

WAAD FAHMI KARTAA KITAABKA QUDUUSKA AH!

Falimaha Rasuullada

BOB UTLEY

PROFESSOR KA HERMENEUTICS

(FASIRAADDA KITAABKA)

TAXANAHA BARASHADA TAFSIIRKA

AXDIGA CUSUB, MAJALLADKA, 03B

BIBLE LESSONS INTERNATIONAL, MARSHALL, TEXAS

1998

Waxa dib loo hubiyay 2008

TUSMADA BUUGGA

Xarfaha Lasoo Gaabsaday Ee Lagu Dhex Adeegsaday Tafsiirkan	i
Rayada Qoraaga: Sidee Tafsiirkani Kuu Caawin Karaa?	iii
Hogaamiinta Wanaagsan Ee Kitaabka Arkhrintiisa: Xaqiiqa Raadinta Shakhsi Ahaaneed	v
Hordhac	1
FALIMAHA RASUULLADA 1	9
FALIMAHA RASUULLADA 2	37
FALIMAHA RASUULLADA 3	78
FALIMAHA RASUULLADA 4	97
FALIMAHA RASUULLADA 5	117
FALIMAHA RASUULLADA 6	138
FALIMAHA RASUULLADA 7	150
FALIMAHA RASUULLADA 8	169
FALIMAHA RASUULLADA 9	183
FALIMAHA RASUULLADA 10	200
FALIMAHA RASUULLADA 11	215
FALIMAHA RASUULLADA 12	226
FALIMAHA RASUULLADA 13	236
FALIMAHA RASUULLADA 14	257
FALIMAHA RASUULLADA 15	269
FALIMAHA RASUULLADA 16	283
FALIMAHA RASUULLADA 17	296
FALIMAHA RASUULLADA 18	313
FALIMAHA RASUULLADA 19	325
FALIMAHA RASUULLADA 20	339
FALIMAHA RASUULLADA 21	354
FALIMAHA RASUULLADA 22	365

FALIMAHA RASUULLADA 23	375
FALIMAHA RASUULLADA 24	384
FALIMAHA RASUULLADA 25	391
FALIMAHA RASUULLADA 26	398
FALIMAHA RASUULLADA 27	411
FALIMAHA RASUULLADA 28	421
Lifaaqa Kowaad: Qeexitaanka Kooban Ee Naxwaha Erayada Giriigga	430
Lifaaqa Labaad: Canbaaraynta Qoraal Ahaaneed	439
Aaqa Saddexaad: Macnaha Erayada Cusub	443
Lifaaqa Afraad: Odhaah Caqiido Ahaaneed	453

TUSMADA MAWDUUCYADA GAARKA AH

Wacdintii Kaniisaddii Ugu Horraysay, 2:14.....	5
Sare Uqaadistii, 1:2	11
Shaqsi Ahaanshaha Ruuxa, 1:2	11
Muuqashooyinkii Ciise Ee Sarakicista Dabadeed, 1:3	13
Tirooyinka Calaamadda Ah Ee Ku Dhex Sugan Qorniinka, 1:3.....	14
Boqortooyada Ilaah, 1:3.....	15
Magacyada Ilaahnimada, 1:6	18
Wacdinta Boobka, 1:8.....	23
Ka Imanaya Daruuraha Dushooda, 1:9.....	23
Jadwalka Magacyadii Rasuullada, 1:13.....	25
Iskariyod, 1:13	26
Dumarkii La Socdaalay Ciise Iyo Xertiisa, 1:14	28
Waxyiga, 1:16	29
Isu Ekaysiin, 1:16	30
Tirada Labo Iyo Toban, 1:21.....	34
Qalbiga, 1:24.....	35
Ruuxa (<i>Pneuma</i>) Ku Jira Axdiga Cusub, 2:2	39
Dabka, 2:3	40
Fikirka Kitaabku Ka Qabo Khamriga Iyo Khamri Cabnimada, 2:13	44
Wacdintii Kaniisaddii Ugu Horraysay, 2:14.....	47
Facan Iyo Faca Iman Doona, 2:17	48
Dumarka Ku Jira Kitaabka Qudduuska Ah, 2:17	49
Suugaanta Abokalaybtiga, 2:19	52
Imaatinka Labaad, 2:20	53
Magaca Rabbiga, 2:21	54
Ciisaha Naasareet, 2:22	55
Rajada, 2:26	58
Xagay Jiraan Kuwii Dhintay?, 2:27	59
Masiix, 2:31	62
Jidh (<i>Sarx</i>), 2:31	62
Saddex Midnimada, 2:32	63
Ilaah Oo Loo Tilmaamay Sida Aadanaha, 2:33	64

Towbad Keenka, 2:38	67
Baabtiiska, 2:38	67
Tawxiid, 2:39	69
Erayga Giriiga Ah Falka Jumlada Loo Adeegsaday Badbaadada, 2:40	71
<i>Koinōnia</i> , 2:42.....	72
Doorasho/ Qadarka Iyo Baahida Loo Qabo Isu Dheeli Tirka Fiqi Ahaaneed, 2:47	74
Axdi, 2:47.....	75
Sadaqad Bixinta, 3:2	80
Ammaan (<i>Doxa</i>), 3:13	84
Bontiyas Bilaatos, 3:13	85
Kan Quduuska Ah, 3:14	86
Xaqnimada, 3:14	86
Mawduuca Gaar Ah: Hoggaamiye(<i>Archēgos</i>), 3:15	90
Rumays, Aamin, Ama Isku Hallayn (<i>Pistis</i> [Magac], <i>Pisteuō</i> , [Fal], <i>Pistos</i> [Sifo]), 3:16	90
Sadukiin, 4:1	99
Sanhedriinka, 4:5	102
Dhagaxgeeseedka, 4:11	105
Subkidda Ku Jirta Baybalka (Bdb 603), 4:27	110
Qoyskii Herodoskii Waynaa, 4:27	110
Geesinimo/Dhiirraanaan (<i>Parrēsia</i>), 4:29	113
Barnabas, 4:36	115
Shaydaan, 5:3	119
Sharka Shakhsi Ahaaneed, 5:3	120
Qaababkii Aaska, 5:6	122
Erayada Giriigga Ee “Tijaabinta”, 5:9	123
Kaniisad (<i>Ekklesia</i>), 5:11	124
Jiniqabe (Ruux Aan Daahir Ahayn), 5:16	127
Jinisaarid, 5:16	128
Farriisiyiin, 5:34	134
Gamalii’eel, 5:34	134
Aaminis, Isku Hallayn, Rumaysad, Iyo Rumaysad Yeelashada Axdiga Hore Dhexdiisa 6:5,.	141
Gacan Saarista Ku Sugaan Kitaabka, 6:6.....	146
Maalinta Baxniintii, 7:18	157
Meesha Ay Ku Taallo Buur Siinay, 7:30	160

Calaamad, 7:43	163
Magic, 8:9	173
Dadaalka, 8:13	175
Quduusiinta 9:13	189
Wiilka Ilaah,	191
Quduusnaanta, 9:20	195
Tawbadkeenka Sida Uu Ugu Jiro Axdigii Hore In The Old Testament, 9:35	196
Xukumid, Xukunka, Iyo Caddaaladda (J5–) Sida Ku Jirta Ishacyaah, 10:42	211
Gacan (Lagu Sifeeyay Yexesqeel), 11:21	221
Wax Sii Sheegidda Axdiga Cusub, 11:27	222
Salaadda Dhexdhexaadinta Ah, 12:5	229
Yacquub, Ciise Walaalkiis Xagga Hooyo, 12:17	233
Waxyiga, 13:1	238
Faahfaahinta, 13:1	238
Soonka, 13:1	239
Qorniinka Cibraaniga, 13:15	244
Dadkii Israa’iil Ka Horreeyay Ee Degenaa Falastiin, 13:19	246
Aragtiyadii Bawlos Ee Sharcigii Muuse, 13:39	252
Mawduuc Gaara Ah: Dirista <i>Apostellō</i> , 14:4	260
U Baahnaanta Sii Socoshada, 14:22	265
Silas/Silfanuus, 15:22	277
Xorriyadda Masiixiga Vs. Masuuliyadda Masiixiga, 15:29	279
Masiixa Iyo Ruuxa, 16:6	287
Magaalada Korintos, 18:1	314
Suugaanta Reer Bariga, 19:10	329
Malagyada Ku Sugaan Qoraallada Bawlos, 19:12	331
Qirasho, 19:18	333
Sharka Iyo Khayrka, 20:19	345
Habaabinta (<i>Aphistēmi</i>), 20:30	349
Dhisidda, 20:32	351
Doonista (Thelema) Ilaah, 21:14	358
Nidarka Nazarite Ka, 21:24	361
Isugu Imaadka Baroordiiq, 22:23	372
Culimo, 23:9	379

Habaarka (Anatheme), 23:14	381
Barnikee, 25:13	395
Awood (<i>Exousia</i>), 26:18	404
“Runta’ Marka La Eego Qoraallada Bawlos, 26:25	408
Mawduuc Gaar Ah: Kuwii Hadhay, Saddex Dareen, 28:25-27	427

XARFAHA LASOO GAABSADAY EE LAGU DHEX ADEEGSADAY TAFSIIRKAN

AB	Anchor Bible Commentaries, ed. William Foxwell Albright iyo David Noel Freedman
ABD	Anchor Bible Dictionary (6 vols.), ed. David Noel Freedman
AKOT	Analytical Key to the Old Testament waxa qoray John Joseph Owens
ANET	Ancient Near Eastern Texts, James B. Pritchard
BDB	A Hebrew and English Lexicon ee Axdiga Cusub, oo uu qoray F. Brown, S. R. Driver iyo C. A. Briggs
BHS	Biblia Hebraica Stuttgartensia, GBS, 1997
IDB	The Interpreter's Dictionary of The Bible (4 vol), ed. George A. Butrick
ISBE	International Standard Bible Encyclopedia (5 vol.), ed. James Orr
JB	Jerusalem Bible
JPSOA	The Holy Scriptures According to the Masoretic Text: A New Translation (The Jewish Publication Society of America)
KB	The Hebrew and Aramaic Lexicon ee Axdiga Hore oo uu qoray Ludwig Koehler iyo Walter Baumgartner
LAM	The Holy Bible From Ancient Eastern Manuscripts (the Peshitta) oo uu qoray George M. Lamsa
LXX	Septuagint (Greek-English) waxaana leh Zondervan, 1970
MOF	Tarjumaadda Cusub ee Kitaabka Quduuska ah, waxaana leh James Moffatt
MT	Masoretic Hebrew Text
NAB	New American Bible Text
NASB	New American Standard Bible
NEB	New English Bible
NET	NET Bible: New English Translation
NIDOTTE	New International Dictionary of Old Testament Theology and Exegesis (5 vols.), ed. Willem A. VanGemeren
NRSV	New Revised Standard Bible
NTV	New International Version
NJB	New Jerusalem Bible

OTPG	Old Testament Parsing Guide by Todd S. Beall, William A. Banks iyo Colin Smith
REB	Revised English Bible
RSV	Revised Standard Version
SEPT	The Septauging (Greek-English) waxaana leh Zondervan, 1970
TEV	Today's English Version from United Bible Societies
YLT	Young's Literal Translation ee Kitaabka Quduuska ah, waxaana qoray Robert Young
ZPBE	Zondervan Pictorial Bible Encyclopedia (5 vols.), ed. Merrill C. Tenney

RAYADA QORAAGA SIDEE TAFSIIRKANI KUU CAAWIN KARAA?

Kitaabaka habka loo turjumo waa mid ku haboon xagga Ruuxa kn oo ah mid la fahmi karo waxaa jira qoraalo beryo hore la qoray. Sidaas aawadeed ayaa ayey fariniintani ilaahay uga timi si aan taan u fahana waa mid ku haboon xiligan xaadirka ah.

Haddaba habkan ruuxiga ah waa mid adag, oo ay adag tahay inaynu qeexno. Miyaanay ahayn inaynu u qayshano oo uu Rabbigu inoo furo tan. Waxaa waajiba inaan u gaajoono (1) Isaga (2) Inaan isaga garanayno iyo (3) Inaan Isaga u adeegno. Habkani waxa uu inoo jahaynayaa salaada, iyo qirasho si buuxdana ay nafteenu isku bedesho. Haddaba wax sahlan ma aha habka ruuxyada loo macnaynaayo, laakiin waa maxay daacadnimada, ay ka fahan san yihiin Kirstaanka aan Ilaah aaminsanayn inuu Kitaabku yahay mucjiso la fahmi karo. waa arrin caadiya hab ahaan in si fudud looga faaloodo tan. Waxa inagu waajiba inaan ku kalsoonaano oo aynaan ka cabsan qoraalada mana aha inay saamayn inagu samayso shiqsiyadeenu amaba hadhabta aan haysano inaan ku salayno. Inagu dhammaanteen waxa aan leenay taariikh . Ma jir mid inaga mid ah oo diidan, ama dhex dhexaad ka ah sida wax loo turjumo. Qoraaladani waxa ay inoo ogolaanayaan inaan si tacadar leh u eegno xaalada ahaan iyo hab ahaanba waxaana jira saddex ghab oo wax loo turjumo tiirar ahaan taasi waxa ay dhisaysaa ama inaga caawinaysaa sidii aan uga guulaysan lahayn waxa inaga inagu salaysan.

Qodobka Ugu Horeeya

Qodobka ugu horeeyaa waxa weeye inaan garanayno taariikh ahaan xiligii la qoray buugaas ka mid ahaa Kitaabka . iyo weliba meeshii khaaska ahayd taariikh ahaan ee qoraagu xiligaa wax ka qoray. Asal ahaan qoraagu waxa uu leeyahay ujeedo. Fariinta uu gudbinayaa. Qoraaladu inaga inoolama macno aha inaynu ula jeedno waxyaabihii asalka ahaa. Ee ay qoreen qoraayaashii xiligii hore, Isaga ujeedadiisu –ma aha inaga sheekadeena, dareenkeena, dhaqankeena iyo shiqsiyadeena ama waxyaabaha ay u baahan yihiin madhabteenu. –kani waa furaha. Qoraaladu waa inay ku salaysnaadaan wada shaqayn sida wax loo turjumayo. Laakiin turjumaadaha sax ahi waa inay had iyo goorba ay ku habaysan yihiin qoraalkeena. Sida waajibka ah waa inay xidhiidh leeyihiin mid walba oo ka mid ah Kitaabka inay qoraaladaasi isku mid yihiin oo ay leeyihiin hal macne . tani waxa ay la macna tahay wixii asal ahaan uu ka qoray Kitaabka qoraagaasi ee uu u muujiyey Ruuxu hogaamintu ee uu ula xidhiidhay isaga maalmihiisii. Tani waxaa laga yaabaa inay hal macne waxaana suuro gal ah inay jiraan kuwo faro badan oo ay suuro gal tahay qoraaladaasi inay ku kala duwan yihiin, dhaqanka iyo marxalada. Hadaba waxaa waajiba inay qoraaladaasi la xidhiidhaan udub dhexaadka runta ah asal ahaan wixii uu qoray qoraagu. Hadaba sababtaas daraadeed, wax barashadani waxa ay inagu hogaaminaysaa inay qoraaladu ay yihiin kuwo la qaabeeyey waxayna ina siinayaan horu dhaca mid walba oo ka mid ah buugaagta Kitaabka Quduuska ah.

Qodobka Labaad

Qodobka labaadna waa sidii loo cadayn lahaa qoraaladu waxa ay ka kooban yihiin. Mid walba oo ka mid ah buugaagta kitaabku waa qoraal hubaala. Kuwa turjumayaa awood uma laha inay ka jaraan hal arrin tan oo ah run oo qabka ah kuwan kale. Sidaas daraadeed, waxaa inagu waajiba inaan si cad u fahno ujeedada laga leeyahay guud ahaanba Kitaabka buugaagtiisa ka hor inta aynaan tujumaado ka bixiin si shiqsiyaada qoraalada qaybhooda. Sida qaybaha khaaska ah-Cutubada iyo sadarada , amaba aayadaha – tan ugalama jeedno waxa uu dhamaan cutubka macnihiisu yahay. Waxaa waajiba dhamaan turjumaadaha inay u socdaan hab sax ah ina eegahyna macnaha ay qabaha kale leeyihiin. Sidaas daraadeed, Wax barashadani waxa ay inagu hogaaminaysaa baadhitaanadu inay yihiin kuwo qaabaysan oo ka caawinaaya ardaydu sidii ay u aqoonsan lahaayeen baadhitaana ugu samayn lahaayeen qaab dhismeedka mid walba oo ka mid ah qoraalada cutub iyo sadarba. Safarada iyo cutubada kala qaybintoodu maha loo muujiyey. Laakiin waxa ay inaga caawinayaan inaga sidii aan u aqoon san lahayn qaybaha.

Turjumaadaha waa isku mid sadar ahaan. –ma aha weedh , erayo, ama habka erayga – kuwani soo socdaa furaha qoraaga Kitaabku uu micne ahaan ula jeedo. Sadaradu waxa ay ku salaysan yihiin in lagu aqoonsado mawduuca. Inta badana kuwaas waxaa loogu yeedhaa qaybo ka mid ah mawduuca. Eray kasta, weedh, ama jumlad ba waxa ay la xidhiidhaan si kastaba oo ay tahay sidii aynu kuwan ugu aqoonsan lahayn. Waa ay xadidan

yihiin, kana weyn yihiin, sharaxaadahooda, a maba su, aalahooda. Furaha runta ah ee si quman wax loo sharxi karo waa in la raaca wixii uu asal ahaan qoray qoraagu iyada oo la fiirinaay sadarka ka sadar kuwan oo ku salaysan waxa ay qoraaladu leeyihiin cutubada kuwaas ayaa waxa ay ka dhigayaan Kitaabka buugiisa. Waxbarashadani waxa ay inagu sidii ay inoogu sahli lahayd una qaabayn lahayd inay ardayda ka caawiso marka ay is bar bar dhiga samaynaayan Ingiriisiga casriga ah turjumidiisa . hadaba turjumaadahaas waa la doortay sababta oo ah waxaa ka shaqeyey tujumayaal kala duwan xagga fekeradaha isla markaasna waxay xambaarsan yihiin aragtiyo kala duwan:

1. United Bible Society's Greek qoraadalani waxa ay u dhowan yihiin daabacaadii afraad (**UBS**) Qoraaladaasi waxa ay ahaayeen sadaro kuwaas oo ahaa qaar casriya oo ay qoreen culumo.
2. New King James Version (NKJV) waxa uu ahaa eray -ka eray qoraaladaas oo ay turjumaadahoodu ku salaysanaayeen Greek kuwaas oo gacanta lagu qoray sida dhaqanku ahaa qoraalkaasna sidaas lagu aqbalay. Kuwani waxa ay ahaayeen sadaro la qaybiyey aan kuwana kuwa kale la xidhiidhin turjumaadahoodu. Hadaba in badan inagama caawin doonaan ardayda inay arkaan ama aqoonsadaan mawduucyadan.
3. New Revision Standard Version (NRSV) waxa uu u cadaynayaa erayba –eray turjumaadihiisa. Tani waxa ay tahay hab kaas oo tilaamaya faraqa u dhexeeya labadan casiriga ah ee qoraaladan. Iyada oo aad u tahay mid aad faa,iido u leh sidii aan u aqoonsan lahayn qaybta.
4. Today English Version (TEV) Waxa weeye mid aad u la yaab leh oo ku haboon tujumaada oo lagu daabay United Bible Society. Tani waxa ay cadaynaysaa in Kitaabka sidaasi loo turjumay marka aan eegno Ingiriisiga casriga ah oo la akhriyi karo . amaba ka hadlaaya uu fahami karo macnaha qoraalada Greek. In badan, oo khaas ah sida Injiilada waxa loo qabyiyaa sadaro mark la eego ka akhinaaya halkii loo eegi lahaa qayb. Waxa jir hab cusub kaasna waa NVI. Ujeedooyinka laga leedahay turjumadaha , kuwami ma aha kuwo ina caawin kara. Waa arin xiiso leh inaan ogaano labadaba UBS iyo TEV inay yihiin kuwo si isku mid ah loo daabacay, ilaa iyo hadana sadaradu waa ay kala duwan yihiin.
5. Jerusalem Bible (JB) waxa weeye wax tar ah oo ku hoon oo lagu turjumay afka Franch Catholic . waxa weeye mid aad inooga caawinaaya marka aan bar bar dhino marka la fiiriyo sadarada kuwaas oo ka yimi fekradaha European ka.
6. Waxa la daabacay qoraaladan sannadii 1995 iyada oo ay ku habaysnaayeen New American Standard Bible (NASB). Kaas oo ahaa mid eray eray loo turjumay. Iyada oo ay ahaayeen aayada aayad sida loo turjumayo sadaradan.

Qodobka Saddexaad

Qodobka saddexaad waxa weeye akhinta Kitaabka iyo turjumaadaha kala duwan si aynu ugu dhegno sida u ugu balaadhna ee suuro galka ah ee aan u helayno micnaha (luqad jirta oo hore) Taas oo laga helaayo erayada Kitaabka ama sadarada dhuqoodu leeyihiin. In ta badan erayga Greek waa la fahami karaa iyada oo siyaabo kala duwan loo fiirinaayo. Kala duwanaasha turjumaadahani waxa ay ina siinayaan fekerado iyo inay inaga caawiyaan inaan aqoonsano sharaxnana Greek qaybaha qoraalada. Kuwaas oo aan ka hor imanayn madhabta. Laakin waxa ay inaga caawinayaan inaga inaan isku dayno inaynu dib ugu laabano qoraaladii asalka ahaa ee ay qalin kooda ku qoreen wixii loo waxyooday qoraayada.

Haddaba fekeradahani waxa ay si deg dega inta badan jid u furayaan sidii ay ardaydu u eegi lahaayeen turjumaadaha. Tan ugalama jeedno inay inoo kala soocayaan, laakiin waxa ay ina siinayaan inaa helo fekerada –aynaan ku wareerin , badanaaba, waxa kale oo jira turjumaado ay suuro gal tahay kuwaas oo aan inaga caawinayn inay yihiin kuwo lagu kalsoonaan karo, wax tarna leh, hadhab ahaan. Tujumaadaha waxaa looga baahan yahay inay lahaadaan macno balaadhan oo isku durbo ridan marka aan eegno kala duwanaanshaha. Inaga oo fiirinayna inaa la ga shakiyin sidii ay ahaayeen qoraaladii hore. Tani waxa ay ina gelinaysa argagax sida ay halkaas in yar oo heshiisa laga helayo kuwa Masiixiyiinta ah kuwaas oo ku doodaaya inuu yahay Kitaabku isha runta.

Qodobadaas oo dhammi waa I caawinayaan inaga si aan uga guulayso in badan inaga sheekadaydii xaalada ahaan I qasbaysay inaan la dagaalamo wax ku saabsan qoraaladii hore. Waxa aan rajaynayaa inay taasi ku caawin doonto barakano ay kuu noqon doonto adiga.

Bob Utley
East Texas Baptist University
June 27, 1996

HOGAAMIINTA WANAAGSAN EE KITAABKA ARKHRINTIISA XAQIIQA RAADINTA SHAKHSI AHAANEED

Inagu miyaan awoodnaa inaan runta ogaano? Xaggee ayaynu se ka helaynaa? Miyeynu inagu si caqli gal ah cadanayn karaynaa tan? Misey se jirtaa waad cayimani oo ina xadaynaysa? Miyey se carqadalaahaasi ka hor imanayaan nolosheena, iyo caalamkaba? Kuwaasi se nolosheena macno ma u leeyihiin? Maxaynu inagu halakan u joognaa? Xaggee ayaynu se aadaynaa? Su,aalahaasi-Saalahaas waxa is weydiinayo oo dhan dadka waana ta ay ka fekerayaan. Bani-aadanku bilowgiiba waxa ay ahaayeen kuwo caqilileh marka alga soo bilaabo ilaa iyo xiligoodii. (Wacdiyaha 1:13-18; 3_9-11). Waxa aan xusuusan karaa marii anigu si khiqsi ah aan u sameeyey baadhitaan. Inay tani udub dhexaad u noqotay naftayda. Waxa aan noqday Mid rumaysad ku leh Masiixa markii aan yaraa-waxaana taa saas aas u ahaa calaamadihii markaati kicida oo kuwa kale oo ka mid ahaa qolyskaga. Haddba sidii aan u koray ee aan u noqonaayey qaar gaadh-su,ashan ayaan naftayda weydiinaayey, xitaa sida ay dunidu u korayso. Dhaqan fudud iyo waxyaabaha ay diinahu farayaan ilama siianyo macno marka aan eego waayo aragnimadaydii iyo waxyaabihii aan akhriyey kuwaas oo ku saabsanaa dareenkayga. Xiligaasi waxa uu ahaa xili aad wareersanaa, oo aan keli ahaan baadhitaan ku samaynaayey. Inta badana aan ahaa mid rajo la,aan ah wijigayguna waxa uu ahaa mid xaas xaasiya. Dunidan adage e aan ku noolahay.

Qaar ayaa waxa ay sheeganayaan inay su,aalahaas adag jawaab u ahayaan. Laakin marki aan sameeyey baadhitaan waxa aan helay inay jawaabahoodu ku salaysan yihiin isaga. (1) qof filosofiya (2) kuwii hore dhaqamadoodii (3) waayo aragnimda shiqsiyaadka. Maba (4)Maskax ahaan kuwa daalan. Dad faro badan waxa ay markaati ka yihiin kuwaas oo si jooto ah halkaas ugu noolaa inay bedeshay iyaga qoraalada kitaabku. Hadaba Masiixiyadu, waxa weeye hab cadaymeed rumaydka iyo aaminaada . ma leenahay awood taas oo aan kaga hadli karo su,aalaha aad ku u adag ee ay bani-aadanku is weydiinayaan noloshooda. Ma aha oo kleiya tani inay tahay tan ina siinaysa inaan lahaano qaab wada shaqayn. Laakiin waayo aragnimadu nooca aan u rumaysan nahay Kitaabka kaas ayaa inaga waxa uu ii keenay degenaansho iyo weliba farxad inaga dereenkagaygii.

Waxa aan ka fekeraayey inaan ahaa mid helay udub dhexaadka noloshayda –inuu yahay Masiixa. Sidii aan uga fahmay qoraalada waxa ay ii ahayd farxad. Iyo angia oo dareen aahaan muujiey wixii qalbigu dareemaayey. Hadaba si kastaba ha ahaatee, Ilaa iyo hada waxa aan xusuustaa argagax iyo xanuun markii ay qalbigayga ku soo dhaceen waxyaabo badan oo ku saabsan buugan iyo sidii loo turjumi lahaa iyo kala duwanaantooda . xilyada qaar ayaa Kaniisadaha kuwaas oo isku mid ah ayay xitaa culumadoodu fekeraan . Cadaymaha iyo muujintuba waa kuwo si xoogan loo rumaysan karo inuunu Kitaabku lahayn meel uu ku dhamaado. Laakiin uu yahay uu mid bilow ah . sidee ayaan u kala sooci karaa amba inta aan diido u cadaynayaa is ka hor imaadyada kuwaas oo ku saabsan kala duwaanshaha turjumaadaha iyada oo ay jiraan fariimo kala duwan oo qoraalada ka mid ah. Kuwaas oo ay qaar ku doodayaan inay leedahay xoog lehna in si buuxda loo rumaysto?

Hadaba shaqadan ayaa u noqotay noloshayda hadaf iyo weliba fursadii rumaysadkayga. Waxa aan oga inaan rumaysad ku qabay Ciise (1) wuxuuna is siiyey farxad weyn iyo nabad. Aniga naftayda waxaa ku jiray waxoogaa turunturooyina kuwaas oo xidhiidh la lahaa dhaqnkagii (shaqadayda Casriga ah) (2) ka koox ahan shaha iyo iska soo hor jeedida qaabka diimaha ee dunidan (Diiamha dunida), (3) isnacaybka madhabaha. Haddaba inaga baadhitaankaygii waxaa ku jiray daneeno kuwaas oo aan ku guul daraystay sidii aan u turjumi lahaa wax ku saabsan qoraaladii hore. Waxa aan aad ula yaabay markii aan shaaca ka qaday waxyaabo badan oo ku saabsan iniga taariikhdaydii iyo feradaydii. Taasna waxa aan u isticmaalay sidii hanti ianga oo qaybaha kale ku weeraray aniga oo cadaynaaya waxa aan anigu rumaysnahay iskuna qancinaaya. Sidee ayay taasi iigu xanuun badnayd markii aan aniga sidan dareemaayey!

In kasta oo aanan weligay diidin guud ahaanba. Waxa aan noqaday mid awooda inuu si wanaagsan u akhriyo Kitaabka. Waxa aan xadeeyey fekeradahaygii ku was oo aan ku cadaynaayey dadka kale waxa ay aqoon ahaan ka qabaan xiligaas markaas la joogay. Ilaa iyo hadana taas kama aanan madax banaanayn, laakin waxa aan ogsoonaa godolooyinka aan leeyahay. Kuwa turjumaanka ahi inta badan waxa ay yihiin cadowga ugu daran marka la eego inay akhriyaan Kitaabka!

Bal aan halkan idiinku tuso qaar ka mid ahaa waxyaabihii aan ka shakisnaa kuwaas oo igu ka liifay inaan bilaabo akhriska Kitaabka si aad adiguna u akhrido, waxaaba laga yaabaa inaad idiguna tan ila imtixaanto aniga.

I. Run kasoo qaadista

- A. Waxa aan rumaysnaa Kitaabku inuu yahay kan keliya ee la inoo muujiyey xagga muujinta nafta ka inoo miijinayna ee uu ka yimina uu yahay Ilaaha runta ah. Sidaas daraadeed, waxaa inagu waajiba inaan ku turjuno iftiinka iyo asal ahaan waxii ay cadeeyeen qoraagu (Waa Ruuxa) in kasta oo bani-aadanka wax qoraa ay leeyihiin sheekooyin kaas ah taariikh ahaan.
- B. Waxa aan rumaysnahay inuu qoray Kitaabka qof isku mid ah-dhaammaan dadkaas! Ilaahay ayaa waxa uu inoo cadeeyey inuu inaga inla hadlay si cad marka aan eegno wax ku saabsan taariikhihii iyo dhaqamada qoraaladoodii. Ilaahay runta ma qariyo-waxa uu doonayaa inaynu fahano! Sidaas daraadeed, waxaa inagu waajiba inaan sida iftiinka maalinta wax u sharaxno sida ay u iftiinto, maha sideena, Kitaabku kama wado inaga wax aan mano u lahayn kuwa aan weli akhriyin amaba aan maqlin. Waxa weeye wax ay fahmi karayaan marka la isku cel celiyo maskada bani-aadanka sida caadiga ah ee ay u isticmaalaan bani-aadanku xidhiidhka hab ahaan iyo xirfad ahaanba.
- C. Waxa aan rumaysnahay Kitaabku inuu cadaynaayo fariinta ujeedada uu ka leeyahay. Ma ha mid isagu is burinaya ama iska hor imanaya qudhisu. In kasta oo aanu ka koobnayn fariimo adag oo aan la fahmi karayn. Ka keliya ee sida wanaagsan Kitaabka u turjumaa waa isla Kitaabka qudhiisa.
- D. Waxa aan rumaysnahay mid walba oo ka mid ah fariimaha (xitaa marka lagu daro wax siisheegida). In ay tahay hal mid ayna leedahay hal fariin oo ay ku salaysan tahay iyada oo la fiirinaayo asal nimadeeda, iyo wixii loo muujiyey qoraaga. In kasta oo aynaan garanayn sida runtii ah sida xaqiiqada ah waxyaabo badan oo ay qoreen kuwii qorayaasha ahaa asal ahaan qoraaladoodii. Waxayaabo badan oo cadaymo ah ayaa halkan la inagu siinayaa.
 1. Nooca (nooca qoraalada) xulashada iyo soo jeedinta fariinta.
 2. Sheekooyinka iyo qaabkooda ama meelihii khaaska ahaa ee ay ka dhacday wax qoridu.
 3. Qoraalada iyo ciwaanada uu buugaasi ka koban yahay sida ugu wanaagsan mid walba qoraalka qaybihiisa.
 4. Qoraalada iyo isku dubaridooda (kormarida) iyo sida ay qoraaladu qayba ahaan u xidhiidhaan marka aan fiirino sida ay isula xidhiidhaan dhamaan fariimahani.
 5. Waxayabaha aas aasiga ah naxwaha mustaqbalka ku shaqaynaya ee ay kula xidhiidhayaan fariintooda.
 6. Erayada xiligaas la joogo lagu doortay fariinta
 7. Hadhxidhaalayaasha fariimaha.


Markii aan soo baranay mid walba gaara ahaan soo aragnay ayaan waxa ujeedada laga leeyahay inga wixii aan ka baranay fariinta. Ka hor inta aan anigu idiin sharxing sida wanaagsan ee loo akhriyo Kitaabka. Bal ii ogalaada inaan kor maro qar ka mid ah habkeena kaas oo maanta la isticmaalo. Taas oo in badan suuro ka dhigtayu habka tujaumaadaha iyada oo tan aan awoodi karo.

II. Qaababka aan haboonayn


- A. Hadii aan iska indho tiro waxa ay qoraladu leeyihiin ee Kitaabka oo aan isticmaalo mid walba oo ka mid ah sadaradiisa, qayb amaba erayo kaas ah sida odhaahtaa oo ah mid runa oo aan la xidhiidhin waxyaabihii uu qoray qoraagu aan u jeedadiisa ahayn.ama ay yihiin xoqaalo dhaadheer. Kuwan in ta badan waxaa loogu yeedhaa “Cadayn qoraalada”
- B. InAga oo iska indho tirayna taariikhda iyo habakeeda xiliyadaas oo buugaas la helay ka soo qaad kaasi inuu ka hadlaayo taariikh wax yarna uu ka sheegaayo amaba aanay jiran waxa taageeraaya qoraalkaas laxftiisa.
- C. Inga oo iska indho tirayna waxayaabaha taariikhiga ah ee buugaagtaas isla markaasna aan akhrino waxa ay ahayd maalin magaaladii uu ku dhasay lagu qoray wargeys. Kaas oo ka hadlaayey Masiixiyiinta casriga ah ee maanta.
- D. Inaga oo iska indho tirayna waxayabaha buugaas ku qoran qoraaladaas oo ah filosooyiyada iyo wax ku saabsan barashada Ilaah. Fariin taasi guud ahaanba lama xidhiidho kuwa mark hore maqla taasina ay tahay asal ahaan wax qayb ka ah wixii uu qoray qoraagu.

E. Inaga oo iska indho tirayna asal ahaan fariintii taas khusaysa sida mid hab uu leeyahay sida uu Ilaah u yaqaan, ama doorasho Mahdab ama. Qoraalo kuwaas oo loo isticmaalo sababo la xidhiidha aawadeed asal ahaan ujeedadii uu lahaayeen qorayaashu si loo tijaabiyo faraiinta. Tani waa qaab inta badan ay raacayaan sida tilamaayo ,marka aad akhrinayso Kitaabka. Taasna waxa ay la micne tahay inaan abuur kuwa ka hadlaaya ee awooda u leh. kuwani inta badan waxa ay la xidhiidhaan sida aan inagu “marka aan akhrino u dareeno ” (Maxay-qoraaladu-aniga macne inoo leeyihiin turjumaadaha).

Ugu yaraan waxaa jira saddex la xidhiidha shaxdan oo laga yaabao inaan ka holeo waxa kasta oo ay qoreen bani-aadanku ayna ku xidhiidheen.



Haddaba markii hore, waxa aan akhrinaynay kuwo kala duwan farsamo ahaan kuwaas oo ay ka halayeen saddexdii arrimood. Laakiin waxa runta ahi waxa ay tahay inay iska cadahay inuu Kitaabku yahay mid la muujiyey, waxana la inoogu cadaynayaa jaantuuskan kaas oo in badan la xidhiidha.



Sida runtii ah dhammaanba saddexdaas arrimoodba waxaa waajiba in ay ka mid yihiin habka wax loo turjumaayo. Iyada oo ay ujeedduna tahay sidii aan u cadayn lahayn. Aniga turjumaadahaygu waxa ay ku cabiran yihiin laba ugu horeeya tusaalayaashii: Asal ahaan wixii uu qoray qoraagu. Angu sida badan waxa aan gaadhy inaan iugu jwaabo aniga oo dhaleecaynaya wixii aan inagu hore baadhitaanka ugu sameeyey. (1) Iswaafajinta ama Ruuxiyanka iyo qoraalada (2) “mid qoraaya ayaa waxa uu ku jawaabay” turjumaadahan (maxay ainga macane ii leedahay). Inaan ku guulaysto talaabo kasta. Waxaa inag inagu waajiba inaan fiirino waxa ay ujeedooyinkeenu yihiin, ee ay ku salaysan yihiin, habka ahaan iyo qoraalada. Laakiin sidee ayaan u fiirin karaa iayga hadii aanay lahayn wax xuduuda inaga turjumaadaheenu, malaha xad, malaha wax u khaas a? Tani waxa weeye hala ay awoodu ka imayso ujeedada qoraalada qaabka u u dhisan yihiin ayaa inaga waxa ay I siinayaan waxoogaa haba kuwaas oo aniga I xadaynaaya sida aan u turjumi laha hadii ay suuro gal tahay turjuuadii dhacday.

Waxaa jira waxyaabo inoo ifiynaaya sida aan wax u sharaxnay marka aan eegno xirfadaheena. Maxay yihiin qaar ka mid waxa wanaagsan ee Kitaabka aan ka akhrino iyo sida ay tujumaaduhu ina tusayaan un badan cadaymaha iyo cawaaqibka.

III. Qaababka wanaagsan ee suurto galka loona akhrin karo Kitaabka

Haddaba marka aan tan eegno inagu ka ma hadlaayo habka midaysan taas oo loo turjumo qayba ha guud ahaan kuwa isku caynka ah iskuna tiirarka ah kuwaasi waxa ay yihiin dhamamaanba qaar aan laga helayn Kitaabka. Buugga wanaagsani waxa uu si khaas ah waxa ee ugu dhow waa. *How To Read the Bible For All Its Worthy*, by Gorden Fee and Dougl Stuart, aas oo ay daabaceen by Zondervan.

Aniga habkaygu waxa uu ku xooga saarayaa ujeedad akhriyaha marka uu u ogalaado Ruuxa Quduuska ahi kaas ayaa inoo cadaynaya Kitaabka runtiisa. Sida marka ay afar qof akhriyayaan si koox ah. Kan ayaa waxa uu samaynayaa Ruuxa , aas aaskana waxa la akhriyayaa qoraalada, ma aha waxa sare. Tani xitaa waxa ay ka caawinaysaa ka wax akhriyaaya in ta badan waxa ay saamayn ku yeelanaysaa ujeedadeena. Waxa aan malay iyada oo la leeyahay “Kitaanka waxaa laga saaray wax badan oo iftiina ujeedooyinkiisa” n “tan anigu ugala ma jeedno inaynu waxa ka bedelayno ujeedada taas oo ku saabsan sidii ay inooga caawin lahayd waxa barashadeena. Laakiin sidii aan u codsan lahayn xiliga ku quman sida aan iyaga u isticmaalayno.

Waxaa inagu waajiba inaan awoodno sidii aan u taageer lahayn inaga kuwa wax inoo turjuma gaar ahaan kuwaas ah qoraalada laftooda sida loo isticmaalo.

1. Asal ahaan wixii ay qoreen qorayaashu.
 - a-Dhacdiiyinka taariikhda
 - b-Qoraalada iyo juladahooda
2. Asal ahaan Qorayaashu doorashadoodii
 - a. Naxwa ahaan qaabka ay u dhisan yihiin (luqad)
 - b. Ujeedada shaqada laga leeyahay.
 - c. Nooca
3. Inagu qaabka aan u fahano
 - a. Muhiimada tusaalayaasha fariimaha

Waxa la inooga baahan yahay inaynu awoodno keenana sababo iyo feradaha caqli gala inay yihiin waxa aan turjumaynaa. Kitaabku waxa uu yahay isha keliya ee rumaysadkeena sidii aan ugu dhaqmi lahayn. Badanaaba, in ta badan Masiixiyiintu iskuma raacsana waxyaabaha kuwaas oo ah wax aan la baranayo ama ba waa ay ku kala duwan yihiin. Tani waxa ay tahay iyada oo ay naftoodu iska hor imanayaan marka laga hadlaayo muujinta waxa Kitaabka leeyahay. Markaas ka dib kuwa rumaysadka lihi ma awoodayaan inay tan isku raacaan waxa ay ina barayaan iyo waxa ay inaga codsanayaan!

Waxa jirta afar wax oo aan soo akhriyay kuwaas oo inaga siinaya arag ku saabsan turjumaadahan soo socda.

- A. Akhriska ugu horeeya ee wareega.
 1. Marka aad fariin keliyga ka akhrido buug. Mar labaad akhri adiga oo isticmaalaaya turjumaad kala duwan fekerad ahaan.
 - a. Eray-eray (NKJV, NABS NRSV)
 - b. Nooyada kala duwanaanshaha
 - c. Sadarada (Living Bible, Amplified Bible)
 2. Waxa aad eegtaa udub dhexaadka ujeedada marka la bilaabayo qoritaanka, iyada oo kuwaas lagu aqoonsanaayo
 3. La diiday (Haddii ay suuro gal tahay) Qyabaha qoraalada, Sida cutubka, sadarka, ama, weedha, taas oo si cad inoogu sheegysa udub dhexaadka ujeedooyinkooda.
 4. Aqoonsiga Qoraalada iyo noocooda.
 - a. Axdiga Hore
 - (1)Sheekada Cibraaniyada
 - (2) Cibraaniyada gabayadoodii (Xigmada iyo qoraalada, Sabuurrada)
 - (3) Gabaydii iyo wax sii sheegidii (ujeedada gabayada)
 - (4) Sharciga iyo furahiisa .
 - b. Axdiga Cusub.
 - (1) Ujeedooyinka (Injiilka sida Falimaha rasuullada)
 - (2) Tusaalayaasha (Injiilka).
 - (3) Waraaqihii
 - (4) apocalyptic-Qoraaladii

B. Akhriska labaad koox ahaan.

1. Waxa aan mar labaad akhriyey buug, inaga oo ka raadinaaya inaan aqoonsado qodobada muhiimka ah ama mawduuca.
 2. Marka aan fiirino inta badan kormarida ee aan si caadiya qoraada u tijaabino si fudud.
 3. Waxa aad fiirisaa ujeedada weydiinta iyo ciwaanka kor marida kuwaas ka baranayno caawinta.
- C. Marka saddexaad ee aan wax akhrinayno koox ahaan.
1. Waxa aad mar labaad akhridaa buuga aad hayso adiga oo ka raadinaayo sidii aad u aqoonsan lahayn sheekooyinka noocooda, inaga oo eegayna goobo kaash ah kuwaas oo uu ku qoran Kitaabka iyo buugaagtiisa.
 2. kor mar guud ku samee badanaa mowduucyada iyo waxyaalaha ay ka hadlayaan
 - a. Qoraaga
 - b. Maalinta
 - c. La helay
 - d. Ujeedada gaar ka ah ee loo qoray
 - e. Noocyada kala duwan ee dhaqamada kuwaas oo la xidhiidha ujeedadeeba aan wax u qornay
 - f. Tiradii iyo taariikhdiid dadka iyo dhacdooyinkoodii
 3. Marka aad fidiso adiga kor maridaada saddarada noocyada qaybaha ee buugaagta aan turjunay. Had iyo goor waxa aan ku aqoonsan karaa qoraalada iyo qaybahooda. Tan waxaa laga yaabaa inaan inay jiraan noocyo badan oo cutibo ahi ama sadaro ah. Tani waxa ay suuro gal kaaga dhigaysaa inaad raacdo wixii uu qoraagu asal ahaan qoray ee suuro galka ahaa iyo qaabayntii qoraalada.
 4. Waxa aad fiirisaa taariikhdaada iyo habkii loo isticmaalay wax barashada inay inaga caawiso.
- D. Akhriskii afraad ee kooxaha
1. Waxa aad akhridaa qoraalada iyo tiradooda kuwaas oo ka soo hor jeeda noocyo badan turjumaado ah.
 - a. eray-eray (NKJV, NASB, NRSV).
 - b. Awood buuxda oo isku mid ah. (TEV. JB)
 - c. Sadarada (Living Bible, Amplified Bible).
 2. waxa aad eegtaa waxa ay leeyiin qoraadu naxwe iyo dhismahiisa .
 - a. Inaan ku celino aaydaha Efesos 1:612, 13
 - b. Ku celinta naxwe ahaan iyo dhisida rooma 8:31
 - c. Dhismaha iyo kala duwanaantooda
 3. Waxa aad taxdaa kuwan soo socda.
 - a. Calaamadaha iyo qaybahooda
 - b. xiliyada aan caadiga ahayn
 - c. Muhiimada iyo dhismaha naxwaha.
 - d. erayada adage e khaas ka ah. Sida ficilada, iyo odhaayada.
 4. Adiga oo eegaaya kuwa ku haboon tusaalooyinka iyo fariimaha
 - a. Waxa aad fiirisaa cadaynayana fariimaha iyo wax barida adigu mawduucii aad soo isticmaashay.
 - (1) (habka barsahada Ilaah) buugaagtiisa
 - (2) Tirooyinka Kitaabka
 - (3) Caalamadaha
 - b. Waxa aad eegtaa qoraalada aad ku biirinayso mawduucaaga. Kuwo faro badan oo run ah waxa ay u taagan yihiin is famid la,aan ka imanaaya kuwo badan oo Dariiqooyinka ah sidii loo cadayn lahaa -qoraalada qaar ka Kitaabka ka mida ayay ka muransan yihiin. Kitaabka guud ahaan waala inoo muujiyey. Waxaana waajiba inaan dhamaystiro fariinta si ay fariinta iyo qoraaladu ay u noqdaan kuwo isku miisaaman marka aan eegno turjumaadaheeda.
 - c. Waxa aad fiirisaa tusaalayaasha kuwaas oo ku yaal hal buug , oo mid qoraa ahi qoray, isku noocna ah. Kitaabku waa waxa ugu wanagsan ee aan turjuno sababta oo ah waxaa tan qoray hal qoraa. Xagga Ruuxa.

5. Waxa aad isticmaashaa waxbarashada taas oo kaa caawinaysa adiga baadhi taankaaga marka aan eegno taariikhaha iyo meelihii ay ka dhaceen
 - a. Barashada Kitaabka
 - b. Buuga laga baadho Kitaabka , buugaagta gacanta, iyo qabka kale qorida loo isticmaalo.
 - c. Kitaabka iyo horu dhaciisa
 - d. Kitaabka iyo qoraaladiisa (marka arrintan eegno waxa aad ka baranaysaa, taas oo u ogolaanaysa wax ay bulshadu rumaysan yihiin, xiligii hore iyo xiliga la joogo, sidii loo caawin lahaa loona saxi lahaa qof ahaan wixii aad soo baratay).

IV. Dabaqida fasiraadda Baybalka

Haddaba marka aan tan eegno waxa aan dib ugu laabanaynaa qoraaladeena. Waxayna kugu qaadanaysaa waqti sidii aad u fahmi lahayd asal ahaan waxa ay qoraaladaasi leeyihiin hab ahaan. Iminka waxaa loo baahan yahay inaad naftaadu tan ku dhaqanto. Iyo dhaqankaaga. Waxa aan cadaynkaraa awooda uu Kitaabku leeyahay “inaan fahano waxa ay leeyihiin qoraala asalka ah ee uu qoraagu yidhi maamihiisa , inaguna aan ku dhaqmano maanta runtaas ”

Qoraalada waxaa waajiba inay raacdo turjumaadaha kuwaas oo ahaa wixii uu asal ahaan qoray qoraagu waa inay labaduba waqtigaas wixii suuro gal ahaa. Kuma salayn karo Kitaabka fariintiisa marka aan eegno maalmahaas aan inagu jooganay. Ilaa iyo inta aan ka ogaanayno waxa ay ina leedahay inaga maanta. Fariibta Kitaabka ulama jeedno waxa aan weligeed macno lahayn!

Waxa aad war bixinka bixinaynaa kormarida, eenaga oo eegayna sadarada habkisa (akhriska koox ahaan 3) tani ma tahay hogaamintaada

Qoraaladu waxaa waajiba in la sameeyo saddaradeeda habaysan, kani ma aha erayga habkiisa. Erayadu waxa ay la micno yihiin wax keliya oo ku saabsan qoraalada. Weedhuhu waxa ay leeyihiin macne keliya qoraaladaas iyaga ah, sadarku waxa uu leeyahay macne iyada oo la eegaayo qoraaladu waxa ay leeyihiin. Qofka keliya ee kaas oo ah mid loo waxyooday kaas oo ku hawlan turjumaadaha habkii uu u qoray asal ahaan qoraalada. Waxa keliya oo aan raacaynaa isaga hogaamintiisa iyada oo uu ka buuxsamaayo Ruuxa Quduuska ahi. Laakiin ka buuxsigu ma aha muujin. Haddii aan nidhaahno “tan waxaa yidhi Sayidka” waxaa inagu waajiba inaan ku tiirsanaano asal ahaan wixii uu qoray qoraagaasi macne ahaan. Qoraaladeenu waxaa waajiba inay la xidhiidhaan aasa taas waxa ay ina leedahay ujeedada guud ee dhammaan la qoray. Habka qoraalada ku salaysan yihiin qayb ahaan iyada oo uu sadarada hab ahaan marka aan fiirino sidii loo horu mariyey.

Looma baahna inaan u ogolaano arrimaheena maabta inaan ku turjuno Kitaabka! Kiabaabka qudhiisa aan u ogolaano inuu hadlo! Waxaa laga yaabaa inaan kaa codsano inaga oo sawir ka qaadanayna tiirarka ay qoraaladu leeyihiin. Kuwaas oo taageeraaya hadii ay dhacsan yihiin qoraaladaasi kuwaas oo taageeraaya tiirarkan. Sida runtii ah, xiliyo faro badan ayaa udubdhecaadkeena ay sidan ahaayeen “inaga” Tiirarkeena –ma aha udub dhexaadka tiirarkeena.

Inaga oo ku salaynayna Kitaabka. Waxaa aad u muhiima inaan xusuusano tan. (inaga oo aqbalayna wax sii sheegida). Hal mid oo leh hal macne kaas oo ahaa kuwo dhacay kaas oo inta badan ka mid ahaa qoraalada Kitaabka. Macnahani waxa uu la xidhiidhaa ujeedada asalka ah sidii uu ula jeeday qoraagu ee uu inoo cadeeyey. Dhibaatooyinkii xiligasi ay iyagu joogeen ayaa mihiisii. Kuwo faro badan waxaa suuro gal u ahaa in la qaybiyo qoraalada macnhooda tan ooh al macno ah lahayd. qoraaladaasi waxa ay ku salaysan yihiin kuwaas oo aan helay, baahiyahoodu waa inay la xidhiidhaan wixii uu asal ahaan qoray macne ahaan qoraagu.

V. Saamaynta Ruux ahaaneed ee fasiraadda

Marar hore ayaan waxa aan ka soo hadlay qoraalada iyo sida ay suuro gal u yihiin marka aan fiirino habka aan u turjuno qoraalada. Iminka waxa aad ii ogolaataan inaan ka hadlo waxyaabaha xagga Ruuxa ku saabsan ee turjumaadaha. Kuwan soo socda ayaa waxa ay ka fiirinaynaa shax taas oo inaga inaga caawinaysa.

- A. Waxaad weydiisataa inuu Ruuxu ku caawiyo (cf. 1 Korintos 1:26-2-16).
- B. Waxa aad u si khaas ah si dembiyaada loo cafiyo lagaagna nadiifiyo dembiyada aad garanayso (cf, 1 Yooxanaa 1:9).
- C. Waxa aad u tukataa wax weyn ee aad doonayso sidii aad u ogaan lahayd Ilaah. (cf, Sabuurka 19:7-14; 42:1 ff; 119:1ff).

- D. Waxa aad ku salaysaa arag cusub si deg dega qaab nololeedkaaga.
- E. Waxa aad ahaataa mid is hoosaysiia waxna baran kara

Aad ayay u adag tahay inaad ilaaliso isu dheeli tirka kaas oo u dhexeeya habka suuro galka ah ee Ruuxa iyo hogaamintiisa Ruuxa Quduuska ah. Kuwan soo socda ayaa aniga waxa ay iga caawinayaan inaan isu dheeli tiro labadan.

- A. Waxa aan ka soo qaadanay James Sire, *Scriptures Twisting* , pp. 17:18:

“Qirashadu waxa ay ka timaadaa Ilaahay dadkiisa ama aha waxa uu dooranaayo ruuxu. Hadaba ma jiro hogaamiye taas oo lagu kala soocaayo Masiixiyiinta marka ay eegno Kitaabka. Lama kala saari karo ma na jiraan dad kuwaas oo xaq u leh inay si sax ah u turjumaan kuwaas oo ay waajib tahay inay inoo miyaadaan. ” Haddab sidaas daraadeed, marka uu ruuxa quduuska ahi siinaayo hadyad khaas ah amaba xigmad waxa aan eegaynaa aqoonta iyo waxa ay inoo tilaamayaan ruuxyadu. Calaamadan ma uu siinin oo keliya Masiixiyiinta inay noqadaan kuwa kale ee awooda u leh inay turjumaan Isaga eraygiisa. Tani waxa ay tahay in mid walba uu dadkiisa barto. Oo ay xukumaan ay eegaan isaga qoraaladiisa Kitaabka kuwaas oo u taagan kuwii uu Ilaahay siiyey awoodiisa xitaa kuwa uu isagu siiyey doorashada khaaska ah. Inay soo koobaan odhahaas waxa aan anigu samaynayaa inaan buugan ka soo saaro. Kitaabku miyuu yahay mid sax ah oo uu Ilaahay u muujiyey bani-aadankiisa oo dhan. Taasi waa inagu awood buuxda oo aan leenahay wax kasta oo ku saabsan waxyaabahan aan ka soo hadalay. Taasi guud ahaanba ma aha wax qarsoon laakiin kuwan si cad in loo fahmi karo. mid walba oo ka mid ah dadka caadiga ah dhaqan kasta oo ay haystaan”

- B. Keirkegaard, waxa uu helay in Bernard Ramm *Protestant Biblical enterparation*, p. 75:

Marka aan fiirino Keirkegaard naxwahiisa, iyo waxyaabihii aan ka soo baranay taariikhda Kitaabka. Waxa weeye mid ay suuro gal u tahay laakiin aas aas ahaan ah in si run ah loo akhriyo Kitaabka. “U akhri inuu Kitaabku yahay *Ilaahay eraygiisa*” Waxaa waajiba inuu mid waliba u akhriyo isaga qalbigiisa iyo weliba afkiisa. isaga oo isticmaalaaya maskaxdiisa aadna ugu baahan. Isla markaasna wadahadal la yeelanaaya Ilaahiisa. Haddaba haddii aad Kitaabka u akhrido si doqon nimo ah aan danayn ma aha oo keliya inay akhriyaan erayga Ilaahay kuwa aqoonyahanada ah. Sida uu mid u akhrinaayo sidii warqad jacal ah oo kale “ayaa mid kalena waxa uu akhriyayaa sidii erayga Ilaah”.

- C. H. H Rowley *the relevance of the Bible* p.19.

Ma mid badanaa si caqliyana u fahmi kara Kitaabka, si kastaba ha ahaatee waa aan dhamaynay. Ma awoodaan dhammaan habkan. Iskama indho tiri karo fahamida caynkan ah. Tani waxa ay tahay mid khaas ah inaan ka haysano fahan dhamaystiran. Laakiin waxaa waajiba inay inagu hogaamiso qananimda xagga Ruuxa buugan isaga ah hadii uu dhamaystirmo. Isla markaasna aan ka fahano xagga Ruuxa inuu kani ka weyn yahay wax kuwa caqliga leh si lagama maarmaana u toosinaaya. Arrimaha xagga ruuxiga cadaynkaraaya. Waxa ay u baahan yihiin ardayda marxalad ay ku helayaan ruuxa. Iyo oo si kulul u raadinaaya sidii ay Ilaah u heli lahaayeen isaga oo isagu qudhiisa u qayshanaaya, haddii uu isagu dhaafo wax ka sareeya baradashadiisa . iyo qani nimadiisa hoose kani waxa uu yahay buuga buugaagta ugu sareeya”

VI. Qaabka Tafsiirkan

The study guide commentary Waxa ay kuu qaabaynaysaa sidii ay kaaga caawin lahayd sidii aad u soo ban dhigi lahayd turjumaadahaaga sidan soo socota.

- A. Marka aan waxoogaa kor maro taariikhda waxa uu soo ban dhigayaa buug kastaaba. Ka dib marka aad dhamayso “*ee aad akhrido kooxda 3*” waxa aad hubisaa akhbaaraadkan
- B. Is waafajiin ayaa ifaysa ayaa laga heli lahaa halka uu ka bilaabmaayo mid kasta oo cutubada ka mid ah. Tani waxa ay kaa caawinaysaa inaad aragtol sida ay qoraadani qaybo u yihiin dhisitaankoodu.
- C. Bilowga mid kasta cutubadan badanaa qoraalada waxa ay leeyihiin qaybo sadaro kuwaas oo qaybinaaya qaoraaklda ina siinaaya turjumid kala duwan oo casri ah.
 - 1. The United Bible Society Greek qoraaladaas, waa daabacaadii afraad waxa ay u dhawran tahay (USB)

2. The New American Standard Bible 1995 dib loo habeeyey (NASB)
3. The New King James Version (NKJV)
4. The New Revised Standard Version (NRSV)
5. Today English version (TEV)
6. The Jerusalem Bible (JB)

Sadarada kala qaybsan ma aha qaar la waxyooday. Waa inay sida waajibka ah ay is waafaqsan yihiin qoraaladoodu. Marka la bar bar dhigaahyo turjumaadada casriga ah kuwaas oo ka imanaaya tujumaado kala duwan iyo fekarado ay leeyihiin kuwa ku xeesha dheer barshada Ilaahay. Imanaka waxa aan awoodnaa inaan baadhi taan kui samayno wax taageeraayan hab ahaan asal kii qoraaladii uu qoraagu ka fekaarayey. Mid kasta oo ka mid ah sadaradan waxa uu xambaar san yahay run aad u weyn. Tana waxa aynu ugu yeedhnaa “Maduuca weedha ama ” “udub dhexaadka farkarada qoraalada”. Kani waxa uu cadaynayaa fekerka furaha saxa ah ee sheekooyinka. Iyo naxwaha iyo sida loo turjumo. Mid ayaa waxaa laga yaabaa inaan weligii wax turjumin weligiina aan nu wax wacdiyin amaba barin wax ka yar hal sadar mooyee! Xitaa waxaa lagaaga baahan yahay sadar walba waxa uu la xidhiidhaa sadarada kale eek u wareegsan. Tani waa sababta ay sadaradu hab ahaan aynu u kor maro buug waliba bina muhiim u yahay. Waxaa iganu waajiba inaan raacno arrimaha kuwa suuro galka ah sida mawduuca kaas oo khuseeya asal ahaantii wixii loo muujiyey qoraaga.

- D. Bob Waxa uu inoo sheegay inuu raacaayey aayadaha- si aayada isaga oo ka taxadaraaya turjumaadaha. Tani waxa ay inagu hogaaminaysaa inaan raacno asal ahaan waxa uu ku fekaarayey qoraagu. Waxa kale oo aad ogaataa inaan ka helaynay akhbaaraadka meelo aad u kala duwan:
1. Maraxalada qoraalka
 2. Taariikhda, dhaqanka, muuqa shada gudaha.
 3. Naxwaha iyo akhbaaraadka.
 4. Barasahada erayga
 5. Muhiimada tusaalooyinka fariinta

- E. marka aan eegno waxyaabo kala duwan oo qoraadeenan ka mid ah, kuwaas waxa ay ku daabacan yihiin qoraal ahaan New American Standard Version (1995) dib u habayntii kuwani waxa ay qab ka ahaayeen tujumaano faro badan oo kala degisan kuwaas oo casri ah noocyo badana leh.
1. New King James Version (NKJV) kuwaas oo raacaaya qoraalka ay bani-aadanku qoreen. “Qoraalka la helay”
 2. The New Standard Version (NRSV) kaas oo ah eray ilaa - eray qoraalkaasina waxa uu ka yimi National council of churches the resaved Standard Version.
 3. Today English version (TEV) kaas oo ah layaab leh kuna baoon turjumaada lagan a soo turjumay American Bible Sociality.
 4. Jerusalem Bible (JB) kaas oo laga soo tujumay luaqada French Catholic kaas oo ahaa mid layaab badan kuna haboon turjumaada.
- F. Haddaba kuwa aan awoodin inay ku hadlaan luqada Greek marka aan bar bar dhigno turjumaada luqada Ingriisiga waxa inaga caawinaysaa sidii aan u fahmi lahayn waxa ay tahay dhibaatadu qoraaladeena.
1. Qoraadii hore
 2. Inaan eegno erayga macanihiisa
 3. Nax wuhu kuwa uu adag yahay qoraalada iyo habkooda
 4. Qoraaladii beenta ahaa.

In kasta oo aan luqada Igriiisiga turjumdiisa aanay xalinayn dhibaataada waxa ay u tahay halis meelaha aad ka u dhaadheer ee u baahan in badan laga fekre barashadooda

- G. Mid walba oo u dhow xidhiidhna la leh cutubka aya marka aan qaadanayno go,aanka su,aalaha ayaa waxa ay ina siinayaan inaan fiirino ujeedadeena muhiimada turjumaada eek u saabsan cutubkan.

HORDHACA FALIMAHA RASUULLADA

ODHAAHDA FURITAANKA AH

- A. Falamiha Rasuulladu waxa uu tusinayaa xidhiidh muhiim ah oo ka dhexeeya waxyaalaha laga diiwaan geliyay noloshii Ciise (Injiillada) iyo xertiisa fasiraaddoodii, wacdintoodii, iyo dabiqaanka ama ku dhaqanka camalladiisii iyo erayadiisii sida ku sugan Warqadaha Axdiga Cusub.
- B. Kaniisaddii ugu horraysay waxa ay hore marisay labo waxyaalood oo isku dhex jira isla markaasna ah qoraallada Axdiga Cusub: (1) Injiillada (afarta Injiil) iyo (2) Rasuulka (warqadihii Bawlos). Si kastaba ha ahaatee wakhtiyadii ay soo if baxday bidcadu ee qarnigii labaad, ayaa kitaabka Falimaha Rasuulladu waxa uu noqday mid muhiim ah. Falimaha Rasuulladu waxa ay muujinayaa waxyaalaha ay koobsanayso iyo ujeedooyinka wacdintii Rasuulladu (*Kerygma*) iyo natiijooyinkii cajiibka lahaa ee injiilka.
- C. Dhacdooyinka taariikh ahaaneed ee ku sugan Falimaha Rasuullada ayaa waxa ay yihiin kuwo uu ansixiyay cilmiga casriga ah ee arkoolojiga ama baadhitaanka taariikhii hore, gaar ahaan marka loo eego xidhiidhka ay la leeyihiin hoggaamiyayaashii Roomaanka.
1. *1.strat'goi*, 16:20,22,35,36 (waxa kaloo adeegsaday hoggaamiyayaashii macbadka, Luukos 22:4,52; Acts 4:1; 5:24-26).
 2. *politarchas*, 17:6,8; iyo *prōtō*, Falimaha Rasuullada 28:7, cf. A. N. Sherwin-White, *Roman Society and Roman Law in the New Testament*.
- Luukos waxa uu diiwaan gelinayaa xaaladihii ka taagnaa kaniisaddii ugu horraysay, xitaa dagaalkii u dhexeeyay Bawlos iyo Barnabaas (Falimaha Rasuullada 15:39). Middani waxa ay tusinaysaa isu dheelli tirnaan iyo caddaalad ku salaysan taariikhda iyo qoraalka fiqiga baadhitaanka lagu sameeyay.
- D. Magaca kitaabka waxa isaga oo qaabab kala duwan ah laga heli karaa qaababka kala duwan ee qoraaladii hore ee Giriigga:
1. Qoraal gacmeedka κ (Sinaiticus), Tertullian, Didymus, iyo Eusebius waxa uu dhigaya “Falimo” (ASV, NIV)
 2. Qoraal gacmeedka B (Vaticanus), D (Bezae) oo ay ku lifaaqanyihiin , Irenaeus, Tertullian, Cyrian, iyo Athanasius waxa ay dhigayaan “Falimaha Rasuullada” (KJV, RSV, NEB)
 3. Qoraal gacmeedka A²(sixitaanka ugu horreeya ee Aleksanderiyaanka), E, G, iyo Chrysostom waxa ay dhigayaan “Falimaha Rasuulladii Quduuska ahaa.”
- Waxa suurto gal ah in erayada Giriigga ah ee *praxeis*, *praxis* (falimo, siyaabo, dabecad, camalo, ku dhaqmitaan) ay ka tarjumayaan qaab suugaaneed hore oo Bariga dhexe ah isla markaasna raacaya nooc tusinaya qaab nololeed iyo carmallada dad caan ahaa isla markaasna lahaa saamayn (sida, Yooxanaa, Butros, Istifanoos, Filibos, Bawlos). Haddaba kitaabku asal ahaan ma laha wax magac ah (sida Injiilka Luukos oo kale).
- E. Waxa jira labo qaab qoraaleed oo dhaqan ahaan uu leeyahay kitaabka Falimaha Rasuulladu. Ka gaabani waxa weeyaan Aleksanderiyaanka (MSS P45, P74, !, A, B, C). Qoraal gacmeedka la qoyska ah Galbeedku (P²⁹, P³⁸, P⁴⁸ and D) waxa uu u muuqdaa inuu koobsanayo faahfaahin dheeraad ah. Lama hubo in ay ka ahaatay faahfaahintani qoraaga ama in wakhtiyo danbe ay ku dareen culimmadu, iyada oo lagu salaynayo dhaqankii kaniisaddii ugu horraysay. Aqoon yahannada qoraallada badankoodu waxa uu rumaysan yahay in qoraal gacmeedyada Galbeedku ay leeyihiin xarfo dheeraad ah sababtuna waa:
1. Waxay dabcinayaan ama isku dayayaan inay hagaajiyaan qoraallada adag een caadiga ahayn.
 2. Waxa ay ku darayaan faahfaahin dheeraad ah.
 3. Waxa ay ku darayaan cibaarooyin dheeraad ah oo adkaynaya Ciise oo ah Masiixa.
 4. May soo xiganin qoraayaashii hore ee Masiixiyiintu saddexdii qarni ee ugu horreeyay (cf. F. F. Bruce, *Acts: Greek Text*, pp. 69-80).

Falaqayn dheeraad ah dheeraad ah waxa aad kala kaashan kartaa *A Textual Commentary on the Greek New Testament* oo uu leeyahay Bruce M. Metzger, waxaana daabacay United Bible Societies, pp. 259-272.

Waxyaalaha badan ee dheeraadka ah aawadood ayaa tafsiiirkani aanu la tacaali doonin ikhtiyaarka qoraallada. Haddii kala duwanaanshaha qoraalku uu muhiim u yahay fasiraadda, markaas ayaan kula tacaali doonnaa tafsiiirkan dhexdiisa.

QORAAGA

- A. Kitaabkan qoraagiisu kama dhex muuqanayo, laakiinse Luukos qoraalkiisa ayaa aad uuga muuqanaya.
1. Qoraalka gaarka ah ee la yaabka leh sida “anagu” (16:10-17 [socdaalkii adeegga labaad ee Filibos]; 20:5-15; 21:1-18 [dhammaadkii socdaalkii saddexaad] iyo 27:1-28:16 [Bawlos oo Rooma loo diray isaga oo maxbuus ah]) ayaa waxa ay tusinaysaa in Luukos uu yahay qoraaga.
 2. Xidhiidhka ka dhexeeya Injiilka saddexaad iyo Falimaha Rasuulladu waxa uu muuqanayaa marka la is barbar dhigo Luukos 1:1-4 iyo Falimaha Rasuullada 1:1-2.
 3. Luukos oo ahaa dhakhtar aan isla markaasna aan Yuhuudi ahayn, waxa la sheegay in uu ka mid ahaa asxaabtii Bawlos sida ku sugan Kolosay 4:10-14, Felimon 24, iyo 2 Timoteyos 4:11. Luukos waa qoraaga keliya een ahayn Yuhuudiga Axdiga Cusub dhexdiisa.
 4. Markhaati furka kaniisaddii hore ee la isku waafaqsanyahay ayaa sheegaya in qoraagu uu ahaa Luukos.
 - a. Muratorian Fragment (A.D. 180-200 oo ka ahaaday reer Rooma ayaa leh “waxa addeecay Luukos oo ahaa dhakhtar”)
 - b. qoraallada Irenaeus (130-200 A.D).
 - c. qoraallada Clement gii Aleksandariya (156-215 A.D).
 - d. qoraallada Tertullian (A.D. 160-200).
 - e. qoraallada Origen (A.D. 185-254).
 5. Caddaynta gudaha ah ee qaabka erayada (gaar ahaan erayada la xidhiidha caafimaadka) ayaa tusinaya in Luukos uu yahay qoraaga (Sir William Ramsay iyo Adolph Von Harnack).
- B. Waxa aan hayna ilo macluumaad ah oo ku saabsan Luukos.
1. Saddexda qoraal ee ku sugan Axdiga Cusub (Kolosay. 4:10-4; Filemon 24; II Timoteyos. 4:11) iyo kitaabka Falimaha Rasuullada laftiisa.
 2. Anti-Marcion qoraalka Luukos (C.D. 160-180)
 3. Taariikhyahanka kaniisaddii hore ee qarnigii afraad, Eusebius, uu ku dhigayo *Ecclesiastical History*, 3:4, waxaanu leeyahay “Luukos oo kasoo jeeda Antiokh, iyadoo shaqadiisu ahayd dhakhtar isaga oo ka agdhowaa Bawlos iyo rasuullada kale, ayaa waxa uu inooga tegay tusaalayaal dawaynaya nafaha kuwaas oo laga helayo labo kitaab oo ah waxyiga, Injiilka iyo Falimaha Rasuullada.”
 4. Tani waa waxyaalo kala duwan oo tusinaya taariikh nololeedka Luukos.
 - a. Muu ahayn Yuhuudi (sida ku sugan Kolosay 4:12-14 waxaanu la jiray Epaphras iyo Demas, lamanuu socon kuwii Yuhuudda caawinayay).
 - b. Waxa uu kasoo jeedaa Antikh dii Siiriya (Anti-Marcion ka Luukos) ama Filibos tii Maqdooniya (Sir William Ramsay sida ku sugan Falimaha Rasuullada 16:19).
 - c. Dhakhtar (Kolosay 4:14), ama ugu yaraan nin aqoon leh.
 - d. Waxa uu Masiixi ku noqday isagoo da’ dhexe ah kaddib markii kaniisaddu ka bilaabantay Antiokh (Anti-Marcion).
 - e. Wuxuu la socday Bawlos (“anaku” qaybo ka mida Falimaha Rasuullada).
 - f. Muu guursanin.
 - g. Waxa uu qoray Injiilka saddexaad iyo Falimaha Rasuullada (waxay isku mid ka yihiin qaabka iyo erayada).
 - h. Waxa uu ku dhintay Boeotia iyadoo da’ diisu tahay 84

- C. Waxyaalaha loollanka ku ah qoraanimada Luukos
1. Wacdinta Bawlos ee Mars Hill ee Athens ayaa waxa uu ku adeegsanayaa erayo faylosufiyadda Giriigga ah (Falimaha Rasuullada 17), laakiinse Bawlos, marka la eego Rooma 1-2, wuxuu u muuqdaa inuu ka hadlayo arrin guud (dabiicad, markhaati fur ku salaysan dhaqan) oon ah waxaan loo baahnayn.
 2. Wacdinta Bawlos iyo faallooyinka ku sugan Falimaha Rasuullada ee ku tilmaamaya Yuhuudi Masiixi ah oo Muuse dhab u qabay, laakiin Bawlos warqadihiisu waxa ay sharciga ku tilmaamayaan inuu yahay dhibaato iyo dhimasho.
 3. Wacdinta Bawlos ee ku sugan Falimaha Rasuulladu ma koobsanayaan waxyaalaha ay muhiimadda siinayaan kitaabadiisa ugu horreeyay (I iyo II Tesaloniika).
 4. Erayadan iyo qaababkan kala soocani waxa ay yihiin kuwo xiiso leh, laakiin maaha kuwo wax soo gunaanadaya. Marka qaabkan lagu dabaqo Injiillada, waxa la arki karaa iyadoo Injiillada kale ay Ciise uuga hadlayaan si ka duwan Yooxanaa siduu uuga hadlayo. Si kastaba ha ahaatee, culimo tiradoodu yartahay ayaa diidaya in labaduba ay ka hadlayaan nolosha Ciise.
- D. Marka laga hadlayo cidda qortay Falimaha Rasuullada waxa muhiim ah in aan ka hadalno ilaha Luukos maxaa yeelay culimmo badan (C. C. Torrey), ayaa rumaysan in Luukos uu adeegsaday qoraallo ah luqadda Aramaatiga (ama dhaqamo) isagoo u adeegsaday badanaa shan iyo tobanka cutub ee ugu horreeya. Haddii tani runtahay, Luukos waxa uu ina siinayaa oo keliya erayada Bawlos oo la soo koobay mana aha wax kale. Adeegsiga Luukos uu adeegsanayo ilo kele ayaa waxa ay tahay su'aal muhiim ah sida qoraanimadiisuba muhiim ugu tahay kitaabka.

TAARIKHDA

- A. Waxa jirta dood badan iyo is khilaaf ka taagan wakhtigii la qoray Falimaha Rasuullada, laakiinse dhacdooyinku waxa ay u noqonayaan 30-63 C.D. (Bawlos waxa lagasii daayay xabsi ku yaallay Rooma badhtamihii 60 kii waxaana dib loo xidhay wakhtigii Nero, waxaana weeyi wakhtigii cadaadiska ee 65 C.D.).
- B. Haddii loo fiirsado doodaha kitaabka ee khuseeya dawladdii Roomaanka, taariikhdu waxa ay noqonaysaa (1) ka hor 64 C.D. (bilowgii cadaadiskii Nero uu ku hayay Masiixiyiintii joogay Rooma) iyo/ama (2) Wax la xidhiidha kacdoonkii Yuhuudda ee C.D. 66-73.
- C. Haddii qof isku dayo inuu Falimaha Rasuullada la xidhiidhiyo Injiilka Luukos iyaga oo isku xigay, markaa taariikhda qoraalka Injiilku waxa ay saamaynasaa taariikhda la qoray Falimaha Rasuullada. Maadaama oo dhacitaankii Yerusaaalem wakhtigii Titus C.D. 70, waa la sii sheegay (Luukos 21), laakiinse lama tilmaamin, waxayna u muuqataa in ay tahay taariikh ka horraysay C.D. 70. Haddii sidaas ay tahayna, Falimaha Rasuullada waxa la qoray isaga oo ahaa wakhti ku xigay Injiilka qoraalkiisa.
- D. Haddii qof uu u qaadan waayo dhammaadka aan la filayn (Bawlos weli waxa uu ku jiray jeelkii Rooma, F. F. Bruce), markaa taariikhdu waxa ay la xidhiidhaa dhammaadka wakhtigii hore ee Bawlos uu maxbuuska ku ahaa Rooma, C.D. 58-63, ayaa la door bidayaa.
- E. Kuwo ka mida dhacdooyinka taariikh ahaaneed ee lagu diiwaan geliyay Falimaha Rasuullada.
1. Cuno yaraantii faaftay wakhtigii Claudius (Falimaha Rasuullada 11:28, a.d. 44-48)
 2. Dhimashadii Herod Agrippa I (Falimaha Rasuullada 12:20-23, C.D. 44 [gu])
 3. Taliyanimadii Sergius Paulus (Falimaha Rasuullada 13:7, iyadoo la magacaabay C.D. 53).
 4. Markii Yuhuudda uu Claudius ka eryay Rooma (Falimaha Rasuullada 18:2, C.D. 49 [?]).
 5. Taliyanimadii Gallio, Falimaha Rasuullada 18:12 (C.D. 51 ama 52 [?])
 6. Taliyanimadii Felix (Falimaha Rasuullada 23:26; 24:27, C.D. 52-56 [?])
 7. Felix oo uu bedelay Festus (Falimaha Rasuullada 24:27, C.D. 57-60 [?])
 8. Saraakiishii Yuhuudiya ee Roomaanka

- a. Badhasaabyadii
 - (1) Bontos Bilatos, C.D. 26-36
 - (2) Marcellus, C.D. 36-37
 - (3) Marullus, C.D. 37-41
- b. Sanadkii C.D. 41 nidaamkii badhasaabnimada ee maamulkii Roomaanka waa la bedelay nidaam ku dhisan khibrad. Boqorkii Roomanka oo ahaa Claudias waxa uu magacaabay Herod Agrippa sanadkii C.D. 41.
- c. Dhimashadii Herod Agrippa I C.D. 44 kaddib, nidaamkii badhasaabka ayaa dib loo soo celiyay ilaa C.D. 66.
 - (1) Antonius Felix
 - (2) Porcius Festus

UJEEEDADA IYO QAABKA

- A. Mid ka mida ujeedada kitaabka Falimaha Rasuullada ayaa waxa uu ahaa diiwaan gelinta koritaanka kuwa raacsan Ciise oo sii badanaya iyagoo aan ahayn Yuhuud oo keliya balse duniada oo dhan ah, taasi oo ka bilaabay qolladii sare isla markaasna gaadhay goobtii Kaysar:
 1. Tusaalahan juquraafi ahaaneed waxa raacayaa Falimaha Rasuullada 1:8, kaasi oo ah faafinta erayga (Matayos 28:19-20).
 2. Fiditaanka juquraafi ahaaneed waxa lagu tilmaamay siyaabo dhowr ah.
 - a. Adeegsiga magaalooyin muhiim ah iyo xuduudo caalami ah. Falimaha Rasuullada dhexdiisa waxa laga helayaa 32 waddan, 54 magaalo iyo 9 jasiiradood oo ku yaalla badda dhexe oo lagu sheegay. Saddexda magaalo ee ugu muhiimsani waa Yerusaaalem, Antiyokh, iyo Rooma (Falimaha Rasuullada 9:15).
 - b. Waxa lagu adeegsaday shakhsiyaad muhiim ah. Falimaha Rasuullada waxa loo qaybin karaa labo qaybood: adeegii Butros iyo Bawlos. Waxa jira in ka badan 95 qof oo lagu dhex sheegay Falimaha Rasuullada, laakiin kuwa ugu muhiimsani waa: Butros, Stefanoos, Filibos, Barnabas, Yacquub iyo Bawlos.
 - c. Waxa jira labo ama saddex qaab suugaaneed oo kusoo noqnoqonaya kana muuqanaya Falimaha Rasuullada, waxaanay u muuqdaan in ay ka tarjumayaan dareenka qoraaga ee isku dayaya qaabka:

(1) hadallada kooban	(2) Hadallada koraya	(3) Adeegsiga tirada
1:1 – 6:7 (Yerusaaalem)	2:47	2:41
6:8 – 9:31 (Falestiin)	5:14	4:4
9:32 – 12:24 (Antiyokh)	6:7	5:14
12:25 – 15:5 (Aasiyada Yar)	9:3	16:7
16:6 – 19:20 (Giriig)	12:24	9:31
19:21 – 28:31 (Rooma)	16:5	11:21,24
	19:20	12:24
		14:1
		19:20

- B. Falimaha Rasuulladu waxa uu la xidhiidhaa fahankii qaldanaa ee ku hareeraysnaa dhimashada Ciise oo u dhintay sidoo oo uu denbiile yahay. Luukos waxa uu u qorayay kuwa aan Yuhuudda ahayn (Theophilus, waxa suurto gala inuu ahaa sarkaal Roomaan ah). Waxa uu adeegsanayaa (1) hadallada Butros, Stifanoos, iyo Bawlos si uu u tusiyo qorshaha sirta ah ee Yuhuudda iyo (2) siraakiisha Roomaanka oo u furfurmaa Masiixiyadda. Roomaanku kamay cabsi qabin kuwa raacaya Ciise Masiix.
 1. Hadallada hogaamiyayaashii Masiixiyiinta
 - a. Butros, 2:14-40; 3:12-26; 4:8-12; 10:34-43
 - b. Istiifanoos, 7:1-53
 - c. Bawlos, 13:10-42; 17:22-31; 20:17-25; 21:40-22:21; 23:1-6; 24:10-21; 26:1-29
 2. xidhiidhkii saraakiisha xukuumadda
 - a. Buntos Bilaatos, Luukos 23:13-25

- b. Sergius Paulus, Falimaha Rasuullada 13:7,12
 - c. Xaakinnadii kalkaaliyayaasha ahaa ee Filibos, Falimaha Rasuullada 16:35-40
 - d. Gallio, Falimaha Rasuullada 18:12-17
 - e. Madaxdii Aasiya ee Efesos, Falimaha Rasuullada 19:23-41 (gaar ahaan aayadda 31)
 - f. Claudius Lysias, Falimaha Rasuullada 23:29
 - g. Felix, Falimaha Rasuullada 24
 - h. Porcius Festus, Falimaha Rasuullada 24
 - i. Agrippa II, Falimaha Rasuullada 26 (Gaar ahaan aayadda 32)
 - j. Publius, Falimaha Rasuullada 28:7-10
3. Marka la is barbar dhigo wacdimaha Butros iyo kuwa Bawlos waxa muuqanaysa in Bawlos aanu ka hadlayn wax cusub, laakiinse uu yahay mid wax ku wacdinaya xaqiiqooyinka ku sugan injiilka. Haddii qof uu wax maynguuriyo, waxa uu noqonayaa Butros (1 Butros) waxaanu adeegsanayaa erayada iyo hadallada Bawlos. Wacdimuhuna waa ay midaysan yihiin!
- C. Luukos Masiixiyadda kumuu hor difaacin dawladda Roomaanka oo keliya, laakiinse Bawlos ayuu ku hor difaacay kaniisadda dadka aan Yuhuudda ahayn. Bawlos waxa si isdaba jooga u canbaareeyay kooxihii Yuhuudda (Yuhuuddii Galatiya, “rasuullada cajiibka ah” ee II Korintos 10-13); iyo kooxihii Helenistigga (Gonostiggii Kolosay iyo Efesos). Luukos waxa uu muujinayaa sidii Bawlos u muujinayay qalbigiisa iyo fiqigiisa markii uu ku jiray socdaalladdiisa wacdinta ah.
- D. Inkasta oo Falilmaha Rasuulladu aanu ahay kitaab caqiido, waxa uu inoo diiwaan gelinayaa wacdintii iyo waxbaristii Rasuullada ee ugu horraysay kuwaas oo C.H. Dodd uu ku magacaabay “*Kerygma*” (runuta asaasiga ah ee ku saabsan Ciise). Tani waxa ay inaga caawinaysaa in aan aragno in wixii ay dareemeeni uu ahaa aasaaska injiilka, gaar ahaan sida ay uula xidhiidhiyeen Ciise dhimashadiisa iyo sara kicistiisa.

MAWDUUC GAAR AH: WACDINTII KANIISADDII UGU HORRAYSAY

- A. Ballan qaadyadii Ilaah ku sameeyay Axdiga Hore waxay ku dhammays tirmeen imaatinka Ciise Masiix (Falimaha Rasuullada 2:30; 3:19,24; 10:43; 26:6-7,22; Rooma 1:2-4; 1 Timoteyos 3:16; Cibraaniyada 1:1-2; 1 Butros 1:10-12; 2 Butros 1:18-19).
 - B. Ciise waxa loo doortay inuu yahay Masiixa markii la baabtiisayay (Falimaha Rasuullada 10:38).
 - C. Ciise shaqadiisa wuxuu ka bilaabay Galilee markii la baabtiisay dabeed (Falimaha Rasuullada 10:37).
 - D. Shaqadiisa waxa ku dheehnaa samaynta waxa wanaagsan iyo mucjisooyin ka tarjumaya awoodda Ilaah (Markos 10:45; Falimaha Rasuullada 2:22; 10:38).
 - E. Masiixa waxa isku tallaabta loogu qodba ujeeddada Ilaah daraaddeed (Markos 10:45; Yooxanaa 3:16; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:13-15,18; 4:11; 10:39; 26:23; Rooma 8:34; 1 Korintos 1:17-18; 15-18; 15:3; Galatiya 1:4; Cibraaniyada 1:3; 1 Butros 1:2,19; 3:18; 1 Yooxanaa 4:10).
 - F. Waxa laga sara kiciyay dhimashada, waxaanu u muuqday xertiisii (Falimaha Rasuullada 2:24,31-31; 3:15,26; 10:40-41; 17:31; 26:23; Rooma 8:34; 10:9; 1 Korintos 15:4-7,12; 1 Tesaloniika 1:10; 1 Timoteyos 3:16; 1 Butros 1:2; 3:18,21).
 - G. Ciise waxa sarraysiiyay Ilaah isagoo siiyay magaca “Rabbiga” (Falimaha Rasuullada 2:25-29,33-36; 3:13; 10:36; Rooma 8:34; 10:9; 1 Timoteyos 3:16; Cibraaniyada 1:3; 1 Butros 3:22).
 - H. H.Wuxuu bixiyay Ruuxa Quduuska ah si uu u sameeyo dadka Ilaah ee cusub (Falimaha Rasuullada 1:8; 2:14-18,38-39; 10:44-47; 1 Butros 1:12).
 - I. Wuu soo laaban doonaa isagoo kama danbaysta adduunyada kala xukumi doona (Falimaha Rasuullada 3:20-21; 10:42; 17:31; 1 Korintos 15:20-28; Tesaloniika 1:10).
 - J. Dhammaan kuwa helay farriintiisu waa inay towbad keenaan oo la baabtiiso (Falimaha Rasuullada 2:21,38; 3:19; 10:43,47-48; 17:30; 26:20; Rooma 1:17; 10:9; 1 Butros 3:21).
- Dhammaanba waxyaalahani waxa ay ahaayeen wacdintii kaniisaddii hore, inkasta oo qorayaasha kala gedisan ee Axdiga Cusubi ay siyaabo kala gedisan ugu tilmaamayaan wacdintooda. Haddaba, gebi ahaanba injiilka uu qoray Markos ayaa waxa uu raacsan yahay wacdintan ay kaniisaddii hore samayn jirtay, waayo Markos asal ahaan waxa uu awoodda saarayaa oo qorayaa wacdiniihii Butros ka sameeyay Rooma. Sidoo kale Matayos iyo Luukos ayaa iyaguna raacaya qaabka Markos ee asaasiga ah.

- E. Frank Stagg ayaa tafsiirkiisa, *The Book of Acts, the Early Struggle for an Unhindered Gospel*, waxa uu ku sheegayaa ujeedada ugu horraysay ee ku saabsan dhaqaajinta farriinta ku saabsan Ciise (injiilka) taasi oo ahayd in laga kaxeeyo Yuhuudda dhexdeeda isla markaasna laga dhigo farriin caalami ah oo u ahaatay aadanaha oo dhan. Stagg tafsiirkiisu waxa uu diiradda saarayaa ujeedada Luukos uu u qoray Falimaha Rasuullada. Soo koobitaan wanaagsan iyo sharraxaad ku saabsan farqiga u dhexeeya aragtiyaha waxa laga heli karaa pp. 1-18. Stagg waxa uu dooranayaa inuu diiradda saaro erayga ah “cidnana uma diidin” sida ku sugan cutubka 28:31, taasi oo ah dhammaad aan caadi ahayn oo kitaabku ku dhammaanayo, iyadoo furana u ah fahanka Luukos xoojinayo ee ku saabsan faafinta Masiixiyadda oo cidina aanay hor istaagi karin.
- F. Inkasta oo Ruuxa Quduuska ah in ka badan konton jeer lagu dhex sheegay Falimaha Rasuullada, haddana maaha “Falimaha Ruuxa Quduuska.” Waxa jira kow iyo toban cutub oon marnaba lagu dhex sheegin Ruuxa. Badanaa waxa lagu sheegay qaybta ugu horraysa ee Falimaha Rasuullada, halkaas oo Luukos uu kusoo xiganayo ilo kale (waxa suurto gala in ay ku qornaayeen luqada Aramaatiga). Falimaha Rasuulladu Ruuxa uma aha waxa Injiilladu u yihiin Ciise! Middan loogalama jeedo in Ruuxa meesha laga saaro, laakiinse waxa weeyi ujeedadu inaan iska ilaalinno dhisitaanka fiqhi u gaara Ruuxa Quduuska oo ku dhex sugan Falimaha Rasuullada.
- G. Falimaha Rasuullada looguma talo galin in uu baro caqiido (cf. Fee iyo Stuart, *How to Read the Bible For All Its Worth*, pp. 94-112). Tusaalaha middani waxa uu noqonayaa isku dayga in asaas loo sameeyo fiqi ka imanaya Falimaha Rasuullada kaasi oo la qadaray inuu guul darraysto. Nidaamka iyo qaabka rumaysad qaadashada ku sugan Falimaha Rasuulladu waa uu kala duwan yahay, sidaasi darteedna waa kee tusaalaha uugu habboona? Waxa la rabaa in aan Warqadaha ka eegno wixii caqiidada inaga caawin kara. Si kastaba ha ahaatee, waxa xiiso leh iyada oo kuwo ka mida culimadu (Hans Conzelmann) ay u arkeen Luukos inuu si kas ah dib ugu habaynayo waxyaalaha dhici doonay qarnigii hore iyadoo uu la socdo qaabka adeeg ee *Parousia* dii dib dhacday. Boqortooyada halkan ayay hadda awood ku leedahay iyadoo bedelaysa nolosha. Kaniisadda hadda shaqaynasaa waxa ay noqonaysaa meesha diiraddu saarantahay, mana aha rajo oo keliya.
- H. Ujeeddo kale oo suurto gala oo Falimaha Rasuulladu leeyahay ayaa waxa ay la mid tahay Rooma 9-11: waa maxay sababta Yuhuuddu u diideen Masiixa Yuhuudiga ah iyadoo kaniisadduna badanaa noqotay kuwo aan Yuhuud ahayn? Meelo dhowra oo ah Falimaha Rasuullada dhexdiisa ayaa dabiicadda caalamiga ah ee injiilku ay si cad uga muuqanaysaa. Ciise waxa uu iyaga u dirayaa dunida oo dhan (1:8). Yuhuuddu way diideen isaga, laakiin kuwa aan Yuhuudda ahayn ayaa aqbalay isaga. Farriintiisu waxa ay gaadhaysaa Rooma. Haddaba waxa suurto gal ah in ujeedada Luukos ay ahayd inuu tusiyo iyada oo Masiixiyadda Yuhuudda (Butros) iyo Masiixiyadda kuwa aan Yuhuudda ahayni (Bawlos) ay si wada jira u kori karaan una wada noolaan karaan! Iyagu kuma jiraan tartan, laakiinse waxay ku kulmeen wacdinta dunida.
- I. Si kastoo ujeedada loo qaataba anigu waxa aan waafaqsanahay F. F. Bruce (*New International Commentary*, p. 18) taasi oo ah maadaama oo Luukos iyo Falimaha Rasuulladu ay asal ahaan isla xidhiidhaan, qaybta qoraalka Luukos (1:1-4) waxa ay ku shaqaynasaa Falimaha Rasuullada. Luukos, in kasta oonu markaati goob jooga wax walba u ahayn, waxa uu si taxaddar ku jiro u baahday dhacdooyinkaas isaga oo si sax ah u diiwaan geliyay, isagoo markaasna adeegsanaya qaabkiisa taariikhda uu u tebinayo iyo fiqigiisa u gaarka ah. Luukos haddaba sida uu Injiilka iyo taariikhdaba kusoo tebinayo, waxa uu rabaa in uu tusiyo xaqiiqada taariikhiga ah iyo fiqiga la isku hallayn karo (Luukos 1:4) ee Ciise iyo kaniisadda. Waxa laga yaabaa in Falimaha Rasuullada diiradda lagu saarayo dhammaystirka (cidnana uma diidin, 28:31, taasi oo ah erayada ugu danbeeya kitaabka). Ujeedadan waxa xambaarsan erayo kale oo dhowr ah (cf. Walter L. Liefeld, *Interpreting the Book of Acts*, pp. 23-24). Injiilku maaha wax mardanbe laga fikiray, oo ah qorshaha labaaad, ama wax cusub. Laakiinse waxa weeyi qorshaha Ilaah ee horeba u jiray cf. Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28; 13:29).

NOOCA

- A. Falimaha Rasuulladu waxa uu Axdiga Cusub u yahay sida Yashuuca u yahay 2 Boqorradii Axdiga Hore dhexdiisa: Tebin Taariikh ahaaneed (eeg Lifaaqa Saddexaad). Dhacdooyinka taariikh ahaaneed ee kitaabiga ahi waxa weeyi xaqiiqooyin, laakiin diiradda ma saarayaan diiwaan gelinta dhacdooyin taariikh ahaaneed oo buuxa. Waxa ay dooranayaan dhacdooyin gaar ah kuwaasi oo sharraxaya cidda uu yahay Ilaah, cidda aan nahay inagu, sida la inoo sameeyay, iyo sida uu Ilaah inaga rabo in aan u noolaano.
- B. Dhibaatada fasiraadda sheekooyinka kitaabka ku sugani waxa weeyi iyada oo qorayaashu aanu qoraalka ku dhigin (1) waxa ujeedadoodu ahayd, (2) xaqiiqada muhiimka ahi waxa ay tahay, ama (3) sidee ayaan uula tacaali karnaa waxyaalaha lagu diiwaan geliyay. Akhristuhu waxa la rabaa inuu ka fikiro su'aalahaan soo socda:
1. Maxaa dhacdadan loo diiwaan geliyay?
 2. Sidee ayay uula xidhiidhaa qayabaha kale ee kitaabka ee ka horreeya?
 3. Waa maxay xaqiiqada fiqi ahaaneed ee ay xanbaarsantahay?
 4. Ma jirtaa muhiimad ku sugan macnahu? (dhacdo nooc ee ah ayaa ka horraysa ama ka danbaysa? Mawduucan meel kale ma lagaga hadlay?)
 5. Intuu leegyahay macnaha tuducyada isla socdaa? (mararka qaarkood qayb badan oo sheekada ka mid ahi waxa ay wadataa ujeedo fiqi ahaaneed oo keliya.)
- C. Sheekooyinka taariikhiga ahi waa in aanay noqonin ilaha keliya ee caqiidada. Waxa badanaa dhacda in waxyaalaha qaar loo diiwaan geliyay iyaga oo si kedis ah usoo dhex galay ujeedada qoraaga. Sheekooyinka taariikhiga ahi waxa ay tusaale u noqon karaan xaqiiqooyin lagu diiwaan geliyay meelo kale oo ka mid ah Kitaabka. Maxaa yeelay wax dhacay ayaan noqon karin ujeedada Ilaah ee u sugnaatay rumaystayaasha casri kasta oo dhan (tusaale ahaan, is dilista, naago badsiga. Jihaadka, qaadista abeesooyinka, iwm).
- D. Falaqaynta faahfaahsan ee ugu wanaagsan isla markaasna ku saabsan sida loo fasiri karo sheekooyinka taariikhiga ah waxa laga heli karaa Gordon Fee iyo Douglas Stuart kitaabkooda *How to Read the Bible For All Its Worth*, pp. 78-93 and 94-112.

TAARIIKHDA KITAABIGA AH

Kitaabo cusub oo Falimaha Rasuullada kaga hadlayaa qarnigii koobaad ayaa lasoo saaray. Waxa ay middani aad gacan uga gaysatay fahanka Axdiga Cusub. Taxanahana waxa dib u sixid ku sameeyay Bruce M. Minter.

- A. *The Book of Acts in Its Ancient Literary Setting*
- B. *The Book of Acts in Its Graeco-Roman Setting*
- C. *The Book of Acts and Paul in Roman Custody*
- D. *The Book of the Acts in Its Palestinian Setting*
- E. *The Book of Acts in Its Diaspora Setting*
- F. *The Book of Acts in Its Theological Setting*

Waxa kaloo iyaguna ku caawin kara

1. A. N. Sherwin-White, *Roman Society and Roman Law in the New Testament*
2. Paul Barnett, *Jesus and the Rise of Early Christianity*
3. James S. Jeffers, *The Greco-Roman World*

AKHRINTA TAXANAHA KOOBAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraaga waxa uu qoray.

Kitaabka oo dhan waxa aad ku akhridaa hal kal fadhi, waxaanad lasoo baxdaa oo ereyadaada ku cabirtaa ujeedada gebi ahaanba kitaabku ka hadlyo

1. Ujeedada gebi ahaanba kitaabka
2. Qaabka qoraalkiisa (nooca)

AKHRINTA TAXANAHA LABAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Marlabaad kitaabka akhri waxaanad soo saartaa ujeedada muhiimka ah adigoo ku cabiraya hal jumalada.

1. Cinwaanka cutubka kowaad
2. Cinwaanka cutubka labaad
3. Cinwaanka cutubka saddexaad
4. Cinwaanka cutubka afraad
5. Iwm.

FALIMAHA RASUULLADA 1

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ballan qaadka Ruuxa Quduuska ah	Afeef	Hordhac; Ciisaha la sara kiciyay	Hordhac	Afeef
1:1-5	1:1-3	1:1-5	1:1-5	1:1-5
	Ruuxa Quduuska oo la ballan qaaday			
Kor u bixistii Ciise	1:4-8	Kor u bixistii	Ciise samadaa kor qoogu qaaday	Kor u bixistii
1:6-11		1:6-11	1:6	1:6-8
	Ciise samaduu u baxay		1:7-9	
	1:9-11			1:9-11
			1-10-11	
Doorashada ciddii bedeli lahayd Yuudas	Kulankii tukashada ee qollada sare	Isu Imaatinkii labo iyo tobanka	Kii bedeli lahaa Yuudas	Kooxdii Rasuullada
1:12-14	1:12-14	1:12-14	1:12-14	1:12-14
	Matiyas baa la doortay			Yuudas booskiisiiba la qaatay
1:15-26	1:15-26	1:15-26	1:15-17	1:15-20
			1:18-19	
			1:20	
			1:21-22	1:21-22
			1:23-26	1:23-26

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

NASB (UPDATED) TEXT: 1:1-5

¹Te'ofilosow, hadalkii hore waxaan ka qoray wax kasta oo Ciise bilaabay inuu sameeyo oo baro ²ilaa maalintii sare loo qaaday isaga oo ka dambaysay wakhtiguu Ruuxa Qoduuskaa ku amray rasuulladii uu doortay. ³Markuu xanuunsaday dabadeed, iyagii ayuu isagoo nool waxyaalo badan oo la hubo isugu muujiyey, oo muddo afartan maalmood ah ayuu iyagii u muuqday, oo kala hadlay waxyaalaha ku saabsan boqortooyada Ilaah. ⁴Oo intuu iyagii la shiray, ayuu wuxuu kula dardaarmay, oo ku yidhi, Yerusaaalem ha ka tegina, laakiinse suga ballankii Aabbaha oo aad iga maqasheen, ⁵waayo, runtii Yooxanaa wuxuu dadka ku baabtiisay biyo, laakiinse waxaa laydinku baabtiisi doonaa Ruuxa Qoduuska ah maalmo aan badnayn dabadood .

1:1 “hadalkii hore waxaan ka qoray” Waa fal dhacay wakhtiga tegay waxna tusmaynaya, macno ahaanna waxa weeyi “waan sameeyay.” Luukos waxa muuqata inuu yahay qoraaga Injiilka Luukos iyo Falimaha Rasuullada (is barbar dhig Luukos 1:1-4 iyo Falimaha Rasuullada 1:1-2). Erayga “majalad” Giriigga dhexdiisa waxa loogu adeegsaday sheeko taariikh ahaaneed. Caadi ahaan waxa lagu dabiqi karaa oo loogala jeedaa ugu yaraan saddex shaqooyin. Waxa suurto gal ah dhammaadka aan caadiga ahayn ee Falimaha Rasuulladu, inuu sharraxayo qorshaha Luukos oo ahaa inuu qoro majalada ama qayb saddexaad. Qaar ayaa waxa ay sheegaan in Warqadaha (1 Timoteyos, 2 Timoteyos, iyo Tiitos) laga yaabo in uu qoray Luukos.

▣ **“Te'ofilosow”** Magacani waxa uu la xidhiidhaa (1) Ilaah (*Theos*) iyo (2) jacayl walaaltinnimo (*philos*). Waxa loo tarjumi karaa “Ilaah jeclaade,” “saaxiibka Ilaah,” ama “Ilaahbaa jeclaaday.”

Magaca “si hagaagsan” ee ku sugan Luukos 1:3 waxa uu noqon karaa magac sharfeed u ahaaday sarkaal Roomaan ah (cf. Acts 23:26; 24:3; 26:25), waxaana suurto gal ah in bulshada Roomaanku adeegsan jirtay. Waxa laga yaabaa inuu ahaa midkii ka faa’idaysanayay qoraalka, isaga oo mayn guurinaya isla markaasna qaybinaya labada kitaab ee Luukos. Dhaqanka kaniisaddu waxa uu isaga ku magacaabayaa T. Flavius Clemens, oo ahaa Domitian inaadeerkiis (C.D. 24-96).

▣ **“wax kasta oo Ciise bilaabay inuu sameeyo”** waxa ay middani tilmaamaysaa Injiilka Luukos. Waxa la yaab leh iyada oo Luukos uu leeyahay “wax kasta” oo Ciise sameeyay, maxaa yeelay Imjiilka Luukos (isagoo la mida Injiillada kale) waxa uu dooranayaa waxyaalaha uu ka diiwaan gelinayo ee ku saabsan noloshii iyo waxbaristii Ciise.

1:2 “ilaa maalintii sare loo qaaday” waxa sidan lagu tilmaamay Luukos 24:51. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: SARE UQAADISTII

Waxa jira erayo Giriiga oo kala gedisan loona adeegsaday sare u qaadistii Ciise:

1. Falimaha Rasuullada 1:2,11,22; *analambanō*, kor u qaadis(cf. I Timoteyos. 3:16), kaasi oo sidoo kale lagu adeegsaday Sebtoojantiga II Boqorradii. 2:9,11 iyadoo loo adeegsaday Ilyaas oo loo xawiladay samada iyo sidoo kale I Maccabees 2:58
2. Falimaha Rasuullada 1:9, *epairō*, sare u qaadis, ama kor u dallicis.
3. Luukos 9:51, *analēpsis* (waxay la mid tahay #1)
4. Luukos 24:51, *diistēmi*, tegitaan
5. Yooxanaa 6:62, *anabainō*, sare u qaadis

Dhacdadan laguma diiwaan gelinin Matayos ama Markos Injiilladooda. Injiilka Markos waxa uu ku dhammaanayaa 16:8, laakiin mid ka mida xarfaha lagu daray ayaa dhacdada ku sheegaysa 16:19 (i.e., *analambanō*).

▣ “Ruuxa Qoduuskaa ku amray” Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: SHAQSI AHAANSHAHA RUUXA

Tani waa sharraxaada koobaad ee qof ahaanshaha “Ruuxa Qudduuska” waa Rooma (ogsoonow ma aha markii ugu horraysay ee reyga la adeegsaday, cf. 5:5; 9:1; 14:17; 15:13,16). Axdigii Hore gudhiisa “Ruuxa Ilaah” (i.e., *ruach*) wuxuu ahaa awoodii dhammaystirtay ujeedkii YHWH, laakiin ma jiraan wax soo jeedinno ah in uu shaqsi ahaa (i.e., Monothieism Axdigii Hore). Arrintu si kastaba ha ahaatee, Axdiga cusub dhexdiisa shaqsiyadda iyo shaqsi ahaansha Ruuxa Qudduuska ah oo buuxda ayaa ku diwaan gashan.

1. Waa lagu aflagaaddoona karaa (cf. Matayos 12:31; Markos 3:29)
2. Wax buu baraa (cf. Luukos 12:12; Yooxanaa 14:26)
3. Marqaati ayuu furaa (cf. Yooxanaa 15:26)
4. Qirashuu sameeyaa, waa hage (cf. Yooxanaa 16:7-15)
5. Waxaa loogu yeeraa “kuma” (i.e., *hos*) (cf. Efesos 1:14)
6. Waa laga caraysiin karaa (cf. Efesos 4:30)
7. Waa la qancin karaa (cf. I Tesaloniika 5:19)

Qoraallada saddexmidnimadu sidoo kale way ka hadlaan saddexda qof

1. Matayos 28:19
2. II Korintos 13:14
3. I Butros 1:2

Ruuxu wuxuu la xiriirsan yahay waxqabadyada aadanaha.

1. Falimaha Rasuullada 15:28
2. Rooma 8:26
3. I Korintos 12:11
4. Efesos 4:30
5. I Tesaloniika 5:15

Bilowga ugu horreeya ee Falimaha Rasuullada Dooraka Ruuxu so xooggan ayuu ugu sharraxan yahay. Maalintii ruuxu soo degay ma ahayn bilowgii shaqadii Ruuxa, laakiin cutub cusub. Ciise had iyo goor Ruuxa wuu watay. Baabtiiskiisii ama maqurintiisii ma ahayn bilowgii shaqadii Ruuxa, laakiin cutub cusub. Luukos wuxuu kaniisadda u diyaariyey boq cusub oo adeegga firfircooni u lahaa. Weli ujeedku waa Ciise Masiix, Ruuxu waa macnaha wax tarka leh oo ka turjumaya jacaylka Aabbaha, cafiska, iyo dib u soo celinta aadanihii isaga aragiisa laga abuuray ayaa yoolku yahay!

▣ “ku amray” waxa ay middani tilmaamaysaa warbixinta ku diiwaan gashan Injiilka Luukos 24:44-49, Matayos. 28:18-20, iyo Falimaha Rasuullada 1:8.

▣ **“amray”** waa fal dhacay wakhti tegay. Culimada qaar ayaa u arka in middani ay sheegayso 1:8 (cf. Matayos. 28:19-20; Luukos 24:45-47 ama Luukos 24:49). Kaniisaddu waxa ay leedahay labo waxyaalood oo ay ku shaqayso:

1. wacdinta iyo qaan gaadhnimada la midnimada Masiixa; rumayste kastaa waa inuu sugo awoodda Ilaah iyo qalabayntiisa si uu middan uugu guulaysto.
2. kuwo kale ayaa iyana u arka in ay tilmaamayso “inay Yerusaaalem ku sugaan inta Ruuxu u imanayo ee uu siinayo awoodda” (aayadda 4; Luukos 24:49).

▣ **“Rasuulladii”** Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:13.

▣ **“uu doortay”** “doortay” (*eklegō*, waa fal dhacay wakhti tegay) waxaana loo adeegsaday labo macne. Hadiyo goor Axdiga Hore dhexdiisa waxa ay tilmaamaysaa adeegitaan, mana aha badbaado, laakiin Axdiga Cusub dhexdiisa waxa ay tilmaamaysaa badbaadada ruuxiga ah. halkan haddaba waxa ay u muuqataa iyadoo sheegaysa labada fikradoodba (Luukos 6:13).

1:3 “isagoo nool waxyaalo badan oo la hubo isugu muujiyey” waxa ay middani tilmaamaysaa Ciise saddexdii jeer uu xerta uugu muuqday qolladdii sare isaga oo u muuqday saddex Axadood oo isku xiga, laakiin sidoo kale waxa ay tilmaami kartaa muuqashooyinkii kale (cf. I Korintos. 15:5-8). Sara kicista Ciise waxa ay muhiim u tahay runta ku jirta injiilka (cf. 2:24,32; 3:15,26; 4:10; 5:35; 10:40; 13:30,33,34,37; 17:31; iyo gaar ahaan I Korintos. 15:12-19,20). Waxyaalahan soo socdaa waxa weeyi muuqashooyinkii Ciise sare kicista kaddib kuwaasi oo uu dhigayo Paul Barnett, *Jesus and the Rise of Early Christianity*, p. 185.

Yooxanaa	Matayos	Luukos	I Korintos
	Muuqashooyinkii Yerusaaalem		Keeyfas (I Korintos. 15:5)
Maryan (Yooxanaa. 20:15)	Haween (Matayos. 28:9)	Simon (Luukos. 24:34)	Labo iyo Tobankii (I Cor. 15:5)
		Labadii u socday Emmaus (Luukos 24:15)	
Xertii (Jn. 20:19) Eeven disciples (Jn. 20:26)		Xertii (Luukos. 24:36)	The Twelve (IKorintos 15:5)
Muuqashooyinkii Galiilee			
			500+ rumaystayaal (I Korintos 15:6; laga yaabaa inay la xidiidho Matayos 28:16-20)
			Yacquub (I Korintos 15:7)
Toddobo xerta ah (Yooxanaa 21:1)	Xertii (Matayos 28:16-20)		
	Muuqashooyinkii Yerusaaalem		
	Sara u qaadistii (Luukos 24:50-51)	Dhammaan Rasuulladii (I Korintos 15:7)	



NASB, NRSV,

NIV “waxyaalo badan oo la hubo”

NKJV “caddaymo badan oo la hubo”

TEV “siyaabo badan oonu shaki gali karin ayaa loo caddeeyay”

NJB “caddaymo badan oo la hubo”

Erayga *tekm'riion* Axdiga Cusub dhexdiisa halkan oo keliya ayaa lagu adeegsaday. Waxa jirta falaqayn fiican oo lagu dhex adeegsaday qoraallada Giriigga sida ku sugan Moulton iyo Milligan, kitaabkooda *The Vocabulary of the Greek Testament*, p. 628, halkaasoo loogala jeedo “caddaymo la hubo.” Eraygan waxa sidoo kale lagu adeegsaday Xikmaddii Sulaymaan 5:11; 19:3 iyo III Maccabees 3:24.

▣ **“Markuu xanuunsaday dabadeed”** waxa la socotay adayg in rumaystayaashii Yuhuuddu ay injiilkan dhinacan ka aqbaleen (1 Korintos 1:23). Xanuunsashada Masiixa waxa lagaga dhex hadlay Axdiga Hore (cf. Bilowgii. 3:15; Sabuurka 22; Ishacyaah 53; Sekaryaah. 10:12; iyo iyadoo lagusoo qaadanayo Luukos 24:45-47).

Luukos badanaa waxa uu adeegsanayaa falka tegay ee *paschō* (silic) isaga oo tilmaamaya Ciise iskutallaab ku qodbitaankiisii (cf. Luukos 9:22; 17:25; 22:15; 24:26,46; Falimaha Rasuullada 1:3; 3:18; 9:16; 17:3). Luukos qaabkan waxa uu ka helay Injiilka Markos (cf. 8:31).

▣ **“iyagii u muuqday”** waxa aan hayna toban ama kow iyo toban jeer oo Ciise muuqday isla markaasna ku diiwaan gashan Axdiga Cusub. Si kastaba ha ahaatee, kuwani waxa ay yihiin tusaalayaal oo keliya. Ciise wakhtigan isaga ah waa uu yimid, laakiinse kooxna lamuu negaanin oo lamuu joogin.

MAWDUUC GAAR AH: MUUQASHOYINKII CIISE EE SARAKICISTA DABADEED

Ciise si uu sarakiciistiisa u tusiyo waxa uu u muuqday

1. Dumarkii qabriga agtiisa joogay, Matayos 28:9
2. Labo iyo tobankii xerta ahaa, Matayos 28:16
3. Simoon, Luukos 24:34
4. Labo nin, Luukos 24:15
5. Xertii, Luukos 24:36
6. Maryantii Magdala, Yooxanaa 20:15
7. Toban xerta ah, Yooxanaa 20:17
8. Kow iyo tobankii xerta ahaa, Yooxanaa 20:26
9. Todobadii xerta ahaa, Yooxanaa 21:1
10. Butros, 1 Korintos 15:5
11. Labo iyo Tobankii (Rasuulladii), 1 Korintos 15:5
12. 500 oo walaalaha ah, 1 Korintos 15:6 (Matayos 28:16-17)
13. Yacquub (qoyskiisii hore), 1 Korintos 15:7
14. Dhaammaan Rasuulladii, 1 Korintos 15:7
15. Bawlos, 1 Korintos 15:8 (Falimaha Rasuullada 9)

Waxa muuqata in aayadahan kuwo ka mid ahi ay sheegayaan muuqasho isku mid ah, Ciisena waxa uu doonay in ay gaartaan inuu nool yahay!

▣ **“afartan maalmood”** tani waa duurxul Axdiga Hore dhexdiisa loogu adeegsado wakhti dheer. Halkanna waxa ay kula xidhiidhaa wakhtiga u dhexeeya ciidda Yuhuudda ee Kormaridda iyo Bentakostiga (oo ah konton maalmood). Luukos waa meesha keliya ee laga heli karo warbixintan. Maadaama oo taariikhda sare u qaadidda aanay ahayn arrin muhiim ah (xitaa qorayaasha Masiixiyiinta ee ilaa qarnigii afraad ee C.D. may soo qaadanin), waxaana laga yaabaa in ay jirto ujeedo kale oo laga leeyahay tiradu. Waxa ay la xidhiidhi kartaa Muuse oo kor jooga Buur Siinay, Israa’iil oo ku sugan duurka, jarribaaddii Ciise, ama ma garanayno, laakiin waxa muuqata in taariikhda lafteedu aanay ahayn muhiimadda.

MAWDUUC GAAR AH: TIROOYINKA CALAAMADDA AH EE KU DHEX SUGAN QORNIINKA

- A. Tirooyin gaara ayaa u shaqeeya iyagoo isugu jira tiro iyo calaamad labadaba.
1. Hal- Ilaah (Sharciga Kunoqoshadiisa. 6:4; Efesos. 4:4-6)
 2. Afar – dhulka oo dhan (afar jiho, afar garab)
 3. Lix – dhammays la'aanta aadanaha (mid ka yar 7, tusaale ahaan, Muujintii. 13:18)
 4. Toddobo – dhammaystirka Ilaahnimada (toddobada maalmood ee abuurka). U fiirso adeegsiga calaamada ee ku sugan Muujintii:
 - a. toddobo laambadood, 1:12,20; 2:1
 - b. toddobo xiddigood, 1:16,20; 2:1
 - c. toddobo kaniisadood, 1:20
 - d. toddobada ruux ee Ilaah, 3:1; 4:5; 5:6
 - e. toddobo laanbadood oo dab ah, 4:5
 - f. toddobo shaabadood, 5:1,5
 - g. toddobo gees iyo toddobo indhood, 5:6
 - h. toddoba malag, 8:2,6; 15:1,6,7,8; 16:1; 17:1
 - i. i toddobo buun, 8:2,6
 - j. toddobo onkod, 10:3,4
 - k. toddobo kun, 11:13
 - l. toddobo madax, 13:1; 17:3,7,9
 - m. toddobo belaayo, 15:1,6,8; 21:9
 - n. toddobo fijaan, 15:7; 21:9
 - o. toddobo boqor, 17:10
 5. Toban- dhammaystir
 - a. adeegsiga Injiillada
 - (1) Matayos. 20:24; 25:1,28
 - (2) Markos 10:41
 - (3) Luukos 14:31; 15:8; 17:12,17; 19:13,16,17,24,25
 - b. Muujintii oo lagu dhex adeegsaday
 - (1) 2:10, toban maalmood oo dhibaato ah
 - (2) 12:3; 17:3,7,12,16, toban gees
 - (3) 13:1, toban taaj
 - c. labanlaabka toban ee Muujintii dhexdeeda
 - (1) $144,000 = 12 \times 12 \times 1000$, cf. 7:4; 14:1,3
 - (2) $1,000 = 10 \times 10 \times 10$, cf. 20:2,3,6
 6. Labo iyo toban – ururada aadanaha
 - a. labo iyo tobanka wiil ee Yacquub (i.e.,labo iyo tobanka qabiil ee Israa'iil, Bilowgii. 35:22; 49:28)
 - b. labo iyo toban tiir, Baxniintii. 24:4
 - c. labo iyo tobanka dhagax, Baxniintii. 28:21; 39:14
 - d. labo iyo toban kibisood, oo la saarayo miiska meesha quduusan(calaamad u ah axdiga Ilaah), Laawiyiintii. 24:5; Baxniintii.25:30
 - e. labo iyo toban qabiil, Sharciga Kunoqoshadiisa. 1:23; Yashuuca. 3:22; 4:2,3,4,8,9,20
 - f. labo iyo tobanka Rasuul, Matayos. 10:1
 - g. adeegsiga Muujintii
 - (1) labo iyo toban kun oo shaabadaysan, 7:5-8
 - (2) labo iyo toban xiddigood, 12:1
 - (3) labo iyo toban albaab, labo iyo toban malag, labo iyo toban qabiil, 21:12
 - (4) labo iyo toban dhag asaaseed, labo iyo tobanka magac ee rasuullada , 21:14
 - (5) Yerusaaalemta cusubi waxay ahayd labo iyo toban labo iyo toban kun oo istadyon oo isku

- wareeg ah, 21:16
- (6) labo iyo tobanka albaab, 21:12
- (7) geedka nolosha oo isugu jira labo iyo toban nooc oo khudrad ah, 22:2
7. Afartan – tirada wakhtiga
- mararka qaar suugaan ahaan (Baxniintii iyo duurjoognimadii, tusaale ahaan., Baxniintii. 16:35); Sharciga Kunoqoshadiisa. 2:7; 8:2
 - waxa uu noqon karaa calaamad
 - Daad, Bilowgii. 7:4,17; 8:6
 - Muuse oo jooga Buur Siinay, Baxniintii . 24:18; 34:28; Sharciga Kunoqoshadiisa. 9:9,11,18,25
 - qaybinta noloshii Muuse:
 - afartan sano Masar dhexdeeda
 - afartan sano saxaraha dhexdiisa
 - afartan sanoo oo uu hoggaminayay Israa’iil
 - Ciise oo soomay afartan cisho, Matayos. 4:2; Markos 1:13; Luukos 4:2
 - u fiirso tirada wakhtiga ee tiradani waxa ay kitaabka ka muuqanaysaa iyadoo wax kala saaraysa!
8. Toddobaatan – tiro dad
- Israa’iil, Baxniintii. 1:5
 - toddobaatan oday, Baxniintii. 24:1,9
 - taariikh ahaan, Daanyeel. 9:2,24
 - koox adeegaysa, Luukos 10:1,17
 - cafis (70x7), Matayos. 18:22
- B. Marjicyo wanaagsan
- John J. Davis, *Biblical Numerology*
 - D. Brent Sandy, *Plowshares and Pruning Hooks*

▣ **“oo kala hadlay waxyaalaha ku saabsan boqortooyada Ilaah”** Gnostiyiinta ayaa sheegtay in Ciise uu kooxdooda u muujiyay sir qarsoon wakhtigii u dhexeeyay Kormaridda iyo Bentakostiga. Waxa hubaal in middani ay tahay been. Si kastaba ha ahaatee, dhacdada ku saabsan labadii kusii socday Emmaus ayaa waxa ay tusaale fiican u tahay sarakicistii Ciise Masiix. Waxa aan u malaynayaa Ciise laftiisu in uu hoggaamiyayaasha kaniisadda Axdiga Hore ka tusiyay waxyaalaha laga sii sheegay ee ku saabsan noloshiisa, dhimashadiisa, sara kicistiisa, iyo Imaatinkiisa Labaad. Eeg Mawduucan Gaarka ah:

MAWDUUC GAAR AH: BOQORTOYADA ILAAH

Axdiga Hore dhexdiisa YHWH waxa loo aqoonsanaa Boqorka Israa’iil (1 Samuu’eel 8:7; Sabuurka 10:16; 24:7-9; 29:10; 44:4; 89:18; 95:3; Ishacyaah 43:15; 44:4,6) Masiixana waxa loo haystay boqorka tusaalaha ah (Sabuurka 2:6; Ishacyaah 9:6-7; 11:1-5). Markii Ciise ku dhashay Beytlaxam (6-4 C.H) Boqortooyada Ilaah waxay qaybisay taariikhda aadanaha iyadoo keentay awood cusub iyo cafis (axdi cusub, Yereyaaah 31:31-34; Yexesqeel 36:27-36). Yooxanaa Baabtiisuhu wuxuu kusii baqayay dhowaanshaha Boqortooyada Ilaah (Matayos 3:2; Markos 1:15). Ciisena wuxuu si cad u sheegay in Boqortooyada Ilaah ay isaga dhexdiisa iyo waxbaristiisa ku jirto (Matayos 4:17,23; 9:35; 10:7; 11:11-12; 12:28; 16:19; Markos 12:34; Luukos 10:9,11; 11:20; 12:31-32; 16:16; 17:21). Sidoo kalena boqortooyada waa mustaqbal (Matayos 16:28; 24:14; 26:29; Markos 9:1; Luukos 21:31; 22:16,18).

Injiillada Markos iyo Luukos waxa siman erayada “Boqortooyada Ilaah.” mawduucan haddaba guud ahaan ka muuqda waxbarista Ciise waxa uu koobsanayaa boqortooyada Ilaah ee qalbiyada dadka xukumaysa hadda iyo iyada oo maalin maalmaha kamida dunida oo dhan xukumi doonta. Waxa middani ka muuqataa tukashadii ciise sida ku sugan Matayos 6:10. Matayos wuxuu wax u qorayay Yuhuudda, sidaasi darteedna wuxuu doorbiday inaanu adeegsan magaca Ilaah (Boqortooyada Janada), halka Markos iyo Luukos uga

qorayeen kuwa aan Yuhuudda ahayn, sidaasi darteedna waxay adeegsadeen magaca Ilaahnimada.

Erayadani haddaba waxay aad uuga muuqdaan Injiillada. Ciise wacdimihiisii ugu horreeyay iyo kuwii ugu danbeeyay, iyo badanaa masaalladiisa, waxay la tacaalayeen mawduucan. Waxaanay sheegaysaa xukunka Ilaah ee uu qalbiyada ku xukumayo imika! Waxaana layaab leh Yooxanaa oo ereyadan labo jeer oo keliya adeegsanaya (kumana sheegayo masaallada Ciise). Yooxanaa injiilkiisa erayga “nolosha weligeed ah” ayaa muftaax ahaan tusaale loogusoo qaadan karaa.

Erayadani waxay tilmaamayaan labada imaatin ee Masiixa. Axdiga Hore wuxuu diiradda saaray oo keliya imaatinka Masiixa Ilaah oo ah, mid awood leh waxna xukumaya, laakiin Axiga Cusubi wuxuu sheegayaa inuu markii hore yimid, isaga oo ah Adeege Silcaya sida ku qoran Ishacyaah 53 iyo boqor is hoosaysiin leh, sida uu dhigayo Sekaryaah 9:9. Labadii casri ee Yuhuudda, casrigii xumaanta iyo casriga xaqnimada badh ahaan ayaa la qariyay. Ciise hadda wuxuu xukumaa qalbiyada rumaystayaasha, laakiinse maalin maalmaha ka mida wuxuu xukumi doonaa khalqiga oo dhan. Wuxuu u iman doonaa sidii Axdiga Hore usii sheegay! Rumaystayaashuna waxay ku dhex noolyihiin “horeda” iyo “welida” boqortooyada Ilaah (Gordon D. Fee iyo Douglas Stuart kitaabkooda *How to Read The Bible For All Its Worth*, pp. 131-134).

1:4

NASB “Oo intuu iyagii la shiray”

NKJV “intuu iyagii isu keenay”

NRSV “goortii uu iyaga la joogay”

TEV “goortii ay isu yimaaddeen”

TEVb “goortii uu iyaga la joogay”

NIV “goortii uu iyaga wax la cunayay”

NJB “goortii uu miista iyaga la joogay”

Aayadaha 4-5 waxa ay adeegsanayaan tusaale ah hal mar oo ka midaha muuqashooyinkiisii dhowrka ahaa iyo caddaymihii. Erayga *sunalizomenos* waxa loo qori karaa dhowr siyaabood. Sidoo kalena qoraalku waxa uu beddelayaa macnaha.

1. shaqalka a dheer – ururin/shirin
2. shaqalka a gaaban – wax la cunis
3. shaqallada au – la joogis

Waxa aan lahubin ka loogala jeeday, laakiin Luukos 24:41-43 (Yooxanaa 21) waxa uu sheegayaa Ciise oo xertii wax la cunay, taasi oo caddayn u noqon karta sara kicistiisa jidh ahaaneed (aayadda 3).

▣ “Yeruusaalem ha ka tegina” middani waxa ay ku qorantahay Luukos 24:49. Qaybta ugu horraysa Falimaha Rasuulladu waxa ay muraajacayn u tahay dhammaadka Injiilka Luukos, waxaana suurto gal ah in ay tahay qaab la isugu xidhayo labada kitaab.

▣ “laakiinse suga ballankii Aabbaha oo aad iga maqasheen,” cutubka 2:16-21 ayaa Butros waxa uu arrintan kula xidhiidhinayaa waxsii sheegista ku qoran Yoo’eel 2:28-32. Waxa ay sugayeen toban cisho ilaa maalintii kontonaad laga gaadhay. Luukos waxa uu si gaar ah “Aabbaha” uula xidhiidhiyay ballan qaadista Ruuxa Quduuska ah (cf. Luukos 24:49; Fal 2:33). Ciise waxa uu iyaga hore uugala hadlay imaatinka Ruuxa Quduuska ah sida ku sugan Yooxanaa 14-16. Si kastaba ha ahaatee, waxa suurto gal ah in Luukos uu fahansanyahay ballan qaadka Aabbaha oon ahayn hal wax oo keli ah (Ruuxa Quduuska ah), laakiinse sidoo kale Axdiga Hore waxa uu ballan qaaday badbaadada loo keeni doono Israa’iil, iyadoo taasina ku imanaysa shakhsiga Masiixa (cf. Fal 2:39; 13:23,32; 26:6).

▣ “Aabbaha” Axdiga Hore waxa uu barayaa tusaale ku saabsan Ilaah oo ah Aabbe:

1. ummadda Israa’iil waxa lagu tilmaamay “carruurtii” YHWH (cf. Hoosheeca. 11:1; Malaakii. 3:17)
2. Sharciga Kunoqoshadiisa waxa lagu Ilaah loogu dhex tilmaamay isagoo Aabbe ah (1:31)
3. Sharciga Kunoqoshadiisa. 32:6 Israa’iil waxa loogu yeedhay “carruurtiisa” Ilaahna waxa loogu yeedhay “Aabbihiin”

4. waxa sidan lagu sheegay Sabuurka. 103:13 iyo sidoo kale Sabuurka. 68:5 (aabbaha agoommada)
5. waxa ay caan ku ahay nebiyadii (cf. Ishacyaah. 1:2; 63:8; Israa'iil oo wiil ah, Ilaah oo Aabbe ah, 63:16; 64:8; Yeremyaah. 3:4,19; 31:9)

Ciise waxa uu ku hadlay luqada Aramaatiga, taasi oo macneheedu yahay meelo badan oo ahaa “Aabbe” in Giriigga ay uuga muuqanayso *Pater* taasi oo ka tarjumaysa Aramaatiga *Abba* (14:36). Waxa ay middan la mid tahay “Aabbe” taasi oo la xidhiidha Aabbaha. Erayga “Aabbe” waxa isagoon badnayn loogu adeegsaday Axdiga Hore dhexdiisa (hadiyo goorna maaha qoraallada rabbaaniyiinta) YHWH, laakiin Ciise in badan ayuu adeegsaday. Waxa weeyi muujin muhiim ah oo rumaystayaasha u muujinaysa xidhiidhka cusub ee Ilaah ay kula leeyihiin Masiixa (Matayos 6:9).

1:5 “Yooxanaa” Dhammaanba afarta Injiil (cf. Matayos. 3:1-12; Markos 1:2-8; Luukos 3:15-17; Yooxanaa 1:6-8,19-28) waxa ay sheegayaa adeeggii Yooxanaa Baabtiisaha. “Yooxanaa” waxa weeyi magaca Cibraaniga ah ee Yooxanan oo lasoo gaabiyay (BDB 220), kaasi oo macnihiisu yahay “YHWH wuu naxariistaa” ama “hadiyaddha YHWH.” Magaciisu muhiim buu ahaa maxaa yeelay, dhammaanba sida magacyada kitaabiga ah, waxa uu tilmaamayaa ujeedada Ilaah ka leeyahay naftiisa. Yooxanaa waxa uu ahaa nebiyada Axdiga Hore kii ugu danbeeyay. Muu jirin wax nebi ah oo loo soo diray Israa'iil ilaa Malaakii, markii taariikhdu ahayd ku dhowaad 430 C.H. jooqitaankiisuna waxa uu keenay in dadka Israa'iil ay helaan xiiso badan oo xagga ruuxiga ah.

▣ **“ku baabtiisay biyo”** Baabtiisku waxa uu caan ku dhex ahaa Yuhuuddii qarnigii koobaad iyo kii labaad, laakiinse waxa uu la xidhiidhay oo keliya arrin gaar ah. Haddii qof asalkiisu aanu Yuhuudi ahayni uu damco inuu noqdo Israa'iili, waxa laga rabay inuu saddex waxyaalood dhammays tiro:

1. in la gudo haddii uu yahay lab
2. in la baabtiiso iyadoo saddex qof markhaati ka yihiin
3. haddii ay suurto gal tahay inuu qurbaan ku bixiyo Macbadka

Kooxa gaar ah ka mid ahaa Falastiiniyiintii qarnigii koobaad, sida Esseniyiinta, baabtiiska waxa uu ku ahaa arrin guud, taasi oo la xidhiidha khibrad soo noqnoqota.

However, to mainline Judaism, ritualism precedents can be cited for this ceremonial washing:

Si kastaba ha ahaatee, in dariiqa Yuhuudda la raaco waxa loo baahna xaflad maydhitaan ah:

1. iyadoo calaamad u ah nadiifinta ruux ahaaneed (cf. Ishacyaah. 1:16)
2. waxa hadiyo goor samayn jiray wadaaddada (cf. Baxniintii. 19:10; Laawiyiintii 15)
3. wax la mari jiray nidaam inta aan macbadka caabuditaan loo galin ka hor.

▣ **“waxaa laydinku baabtiisi doonaa Ruuxa Qoduuska”** waa fal mustaqbalka dhici doona. Waxa ay middani tilmaamaysaabaa dhici karta Ciise sida ku xusan Matayos 3:11; Luukos 3:16. Magac u yaalka *ev* waxa macnihiisu noqon karaa “lagu samaynayaa,” (qalab, Matayos 3:11). Erayadani waxa ay tilmaami karaan labo dhacdo: (1) noqoshada Masiixi, (1 Korintos 12:13) ama (2) macnaha halkan ka muuqda, ballan qaadka awoodda ruuxiga ah ee wax ku oolka u ah adeegga. Yooxanaa Baabtiisuhu waxa uu in badan ka hadlay adeegga Ciise isaga oo erayada adeegsanaya (cf. Matayos. 3:11; Markos 1:8; Luukos 3:16-17; Yooxanaa 1:33).

Middani waxa ay gaar yeelaysaa baabtiiskii Yooxanaa. Masiixa ayaa maamuli doona da'da cusub ee Ruuxa. Baabtiiskiisuna waxa uu ku iman doonaa Ruuxa. Waxa jirtay falaqayn badan oo u dhaxaysay madaahibta sida ay dhacdadani Masiixiyiinta u tilmaamayso. Qaar ayaa u qaatay in ay sheegayo iyadoo ah khibrad xoogayn ah badbaadada dabadeed, taasi oo ah nooc barakadayn labaad ah. Shakhsi ahaan anigu waxaan u malaynayaa in ay tilmaamayso Masiixi noqoshada (1 Korintos 12:13). Ma diiddani buuxinta iyo qalabaynta danbe, laakiinse waxaan rumaysanahay inuu jiro hal baabtiisam oo ruuxi ah oo rumaystayaasha lagu baabtiiso magaca Ciise iyaga oo garanaya oo qiraya dhimashada iyo sara kicista Ciise (cf. Rooma. 6:3-4; Efesos. 4:5; Kolosay. 2:12). Shaqadan ugu horraysa ee Ruuxu waxa ay ka muuqanaysaa Yooxanaa 16:8-11. Sida aan u fahansanahay shaqooyinka Ruuxa Quduusku waa:

1. qirashada denbiga
2. muujinta xaqiiqada ku jirta Masiixa
3. u hoggaaminta aqbalitaanka injiilka
4. ku baabtiisma Magaca Masiixa

5. rumaystaha oo si joogto ah u qirta denbiga
6. ku qaabaysiinta la midnimada Masiixa ee rumaystaha.

▣ **“maalmo aan badnayn dabadood”** waxa middani ay u noqonaysaa ciiddii Yuhuudda ee Bentakostiga taasoo noqonaysay toddoba usbuuc Kormaridda dabadeed. Waxa lagu xusi jiray Ilaah iyada oo imanaysay konton cisho Kormarista dabadeed (cf. Laawiyiintii. 23:15-31; Baxniintii. 34:22; Sharciga Kunoqoshadiisa. 16:10).

NASB (UPDATED) TEXT: 1:6-11

⁶Sidaas daraaddeed markay isu yimaadeen, ayay weydiyeen isaga oo waxay ku yidhaahdeen, Rabbow, ma haddeer baad boqortooyada u soo celinaysaa Israa'iil? ⁷Markaasuu iyaga ku yidhi, Dantiinna ma aha inaad ogaataan wakhtiyada iyo xilliyada uu Aabbuhu amarkiisa kaga dhigay. ⁸laakiinse waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa Qoduuska ahi idinku soo dego; oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Yerusaaalem, iyo Yahuudiya oo dhan, iyo Samaariya, iyo meesha dunida ugu fog. ⁹Oo kolkuu waxyaalahaas yidhi dabadeed, iyagoo eegaya, ayaa sare loo qaaday isagii, oo daruur baa indhahoodii ka qarisyay. ¹⁰Oo intuu sii socday, iyagoo samada aad u fiirinaya, ayaa waxaa isa soo ag taagay laba nin oo dhar cadcad qaba, ¹¹oo waxay ku yidhaahdeen, Nimankiinan reer Galiliyow, maxaad la taagan tihiin oo aad samada u eegaysaan? Ciisahan samada laydiinka sare qaaday, sidaad u aragteen isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa.

1:6 **“ayay weydiyeen isaga”** falkan aan dhammayska tirnayn waxa loogala jeedaa mid ahaan inuu yahay fal tegay ama bilowga fal. Iyadoo kala gaar ah ayaa xertani ay wax waydiyeen wakhtiyo badan.

▣ **“Rabbow”** erayga Giriigga ah ee “Rabbi” (*kurios*) waxa loo adeegsan karaa macne guud ama macno fiqi ahaaneed oo la horumariyay. Waxa macnehiisu noqon karaa “mudane,” “macallin,” “xaas,” ama “ruuxa Ilaah ee dhammaystiran” (Yooxanaa 9:36, 38). Axdiga Hore (Cibraani, *adon*) adeegsigiisa eraygani waxa uu ka yimid ku dhawaaqista Yuhuuddu ay ku dhawaaqayeen magaca axdiga ee Ilaah, YHWH, kaasi oo ahaa qaabka falka Cibraaniga ah ee “ahaansho” (Baxniintii 3:14). Iyagu waxa ay ka cabsi qabeen jebinta Amarrada kaasoo yidhi “Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin” (Baxniintii 20:7; Sharciga Kunoqoshadiisa 5:11). Haddaba, waxa ay u malaynayeen haddii aanay ku dhawaaqin magaca, in aanay been u qaadin. Sidaasi darteedna waxa ay ku beddeleen magaca Cibraaniga ah ee *adon*, kaasoo macnihiisu la mid yahay erayga Giriigga ah ee *kurios* (Rabbi). Qorayaasha Axdiga Cusubina waxa ay eraygan u adeegsadeen sheegitaanka ilaahnimada buuxda ee Masiixa. Erayada “Ciise waa Rabbi” waxa ay ahaayeen qirashada fagaarayaasha ee rumaysadka wakhtiyada baabtiiska ee kaniisaddii hore (cf. Rooma. 10:9-13; I Korintos. 12:3; Filiboyl. 2:11).

MAWDUUC GAAR AH: MAGACYADA ILAAHNIMADA

A. *El*

1. Macnaha asalka ah ee erayga ilaahnimada ayaa aqoonyahanno badani waxay aaminsan yihiin inuu ka tarjumayo ‘awood badnaan’ (Bilowgii 17:1; Tirintii 23:19; Sharciga Kunoqoshadiisa 7:21; Sabuurka 50:1).
2. Kancaniyiinta marka aan eegno ilaaha ugu sarreeya waxay ku magacaabi jireen El (qoraallada Ras Shamra).
3. Kitaabka Quduuska ah magaca El lama socdaan waxyaabo kale, tanina waxa ay tusinaysaa dabecadda Ilaaha keliya.
 - a. *El-Elyon* (Ilaaha Sarreeya), Bilowgii 14:18-22; Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8; Ishacyaah 14:14
 - b. *El-Roi* (Ilaaha wax arka) amaba (Ilaaha is muujiya), Bilowgii 16:13
 - c. *El-Shaddai* (Ilaaha awoodda leh) amma (Ilaaha Naxariista oo dhan leh) amma (Ilaaha buuraha), Bilowgii 17:1; 35:11; 43:14; 49:25; Baxniintii 6:3
 - d. *El-Olam* (Ilaaha daa’imka ah), Bilowgii 21:33. Tani waxay la xidhiidhaa ballan qaadkii Ilaah

- siiyay Daa'uud, 2 Samuu'eel 7:13,16
- e. *El-Berit* (Ilaaha Axdiga), Xaakinnada 9:46
4. El waxay u dhigantaa
- YEHOWAH ee Sabuurka 85:8; Ishacyaah 42:5
 - Elohim ee Bilowgii 46:3; Ayuub 5:8, "Anigu waxaan ahay Ilaaha ah Ilaaha aabbahaa"
 - Shaddai ee Bilowgii 49:25
 - "Xaasid" ee Baxniintii 34:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 4:24; 5:9; 6:15
 - "Ilaah naxariis badan" ee Sharciga Kunoqoshada 4:31; Nexemyaah 9:31; "Ilaaha aaminka ah" ee Sharciga Kunoqoshadiisa 7:9; 32:4
 - "Ilaah weyn oo laga cabsado" ee Sharciga Kunoqoshadiisa 7:21; 10:17; Nexemyaah 1:5; 9:32; Daanyeel 9:4
 - "Ilaah wax walba yaqaan" ee 1 Samuu'eel 2:3
 - "Ilaah waa qalcaddayda xoogga badan" ee 2 Samuu'eel 22:33
 - "Ilaaha aniga ii aarguda" ee 2 Samuu'eel 22:48
 - "Ilaaha Quduuska ah" ee Ishacyaah 5:16
 - "Ilaaha xoogga badan" ee Ishacyaah 10:21
 - "Ilaah waa badbaadadayda" ee Ishacyaah 12:2
 - "Ilaaha wayn ee awoodda badan" ee Yeremyaah 32:18
 - "Ilaaha abaal marinta" ee Yeremyaah 51:56
5. Badanaa magacyada Ilaah ee Axdiga Hore iyagoo isku dhex jira waxa laga heli karaa Yashuuca 22:22 (El, Elohim, YEHOWAH, ..)
- B. *Elyon*
- Macneheeda caadiga ahi waa 'sarreeya' (Bilowgii 40:17; 1Boqorradii 9:8; 2 Boqorradii 18:17; Nexemyaah 3:25; Yeremyaah 20:2; 36:10; Sabuurka 18:13).
 - Waxa loo isticmaalay iyadoo labarbar dhigayo magacyo kaloo Ilaah leeyahay.
 - Elohim – Sabuurka 47:102; 73:11; 107:11
 - YEHOWAH – Bilowgii 14:22; 2 Samuu'eel 22:14
 - El-Shaddai – Sabuurka 91:1,9
 - El – Tirintii 24:16
 - Elah – waxa lagu isticmaalay Daanyeel 2-6 iyo Cesraa 4-7, waxaanay la xidhiidhaa Ilaaha sarreeya ee Daanyeel 3:26; 4:2; 5:18,21
 - Xitaa waxa isticmaalay kuwa aan Israa'iliyiinta ahayn
 - Melkisaadeq, Bilowgii 14:18-22
 - Balcaam, Tirintii 24:16
 - Muuse oo la hadlayay dadka Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8
 - injiilka uu qoray Luukos isagoo u qoraya kuwa aan Yuhuudda ahayn (1:32,35,76; 6:35; 8:28; Falimaha Rasuullada 7:48; 16:17).
- C. Elohim (jamac), Eloah (keli), waxa lagu isticmaalay gabayada
- Eraygan lagama helayo meel ka baxsan Axdiga Hore.
 - Eraygani waa mid loo isticmaali jiray Ilaah Israa'iil iyo ilaahyada kale ee ummada kale caabudi jireen (Baxniintii 12:12; 20:3). Qoyska Ibraahim waxay caabudi jireen sanamyo (Yashuuca 24:2).
 - Waxa lagu tilmaami karaa xaakinnadii Israa'iil (Baxniintii 21:6; Sabuurka 28:6).
 - Waxa kaloo loo isticmaalay (malaa'igaha iyo ruuxyada jinka) sida Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8; Sabuurka 8:5; Ayuub 1:6; 38:7. Waxaana sidoo kale lagu tilmaamay xaakinnada aadanaha (Baxniintii 21:6; Sabuurka 82:6).
 - Kitaabka Quduuska ah waa magaca ugu horreeyay ee Ilaahnimada (Bilowgii 1:1). Si gaara ayaa loogu isticmaalay ilaa laga gaadho 2:4 waxayna la midowdaa YEHOWAH. Waxay tilmaamaysa Ilaaha abuuray dunida, ee nolosha socodsiiya isla markaana nooleeya oo wax siiya wax kasta oo ku dul nool dunida (Sabuurka 104).

Waxay la mid tahay El (Sharciga Kunoqoshiisa 32:15-19). Waxa kaloo ay la mid tahay YEHOWAH sida ku qoran Sabuurka 14 (elohim) oo la mida Sabuurka 53 (YEHOWAH).

6. inkasta oo jamaac ahaan loogu isticmaalay ilaahyada kalee dadku caabudi jireen, hadana Ilaaha Israa'iil waxa loogu isticmaali jiray keli ahaan.
7. Erayadani waxay kasoo baxeen afka dadkii aan Israa'iiliyiinta ahayn iyadoo magaca ilaahnimada loo isticmaalay.
8. Waxa layaab leh magacyada guud ee Ilaah oo dadka Israa'iil mararka qaar u isticmaaleen jamaac ahaan ama iyagoo badan!
 - a. Luqada Cibraaniyadu waxa leedahay waxyaabo badan oo jamaac ahaan amma iyagoo badan erayada loo adeegsado.
 - b. Waxa laga yaabaa inay tilmaamayso malaa'igtu marka ay la kulmayaan Ilaah (1 Boqorradii 22:19-23; Ayuub 1:6; Sabuurka 82:1; 89:5,7).
 - c. Waxa suurto gal ah inay ka tarjumasoo waxyiga Axdiga Cusub ee tilmaamaya saddexnimada. Bilowgii 1:1 Ilaah waxuu sameeya abuurka; Bilowgii 1:2 Ruuxa Ilaah wuxuu ku dul dhaqaaqay biyaha, oo sida Axdiga Cusub aan ka arki karnona Ciise bilowgiiba wuxu la jiray Ilaah (Yooxanaa 1:3,10; Rooma 11:36; 1 Korintos 8:6; Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:2; 2:10).

D. YEHOWAH

1. Kani waa magaca uu Ilaah axdigiisa kula dhigtay aadanaha; dadku way jebiyaan axdiga Ilaah, hase ahaatee Ilaah waa badbaadiyaha cafiska badan ee dhowra ballan qaadkiisa (Sabuurka 103).

Magacan ugu horrayntii wuxuu la socdaa Elohim sida aan ka arki karno Bilowgii 2:4. Ma jiraan labo dhacdo oo ah abuurka dunida sida aan ka arki karno Bilowgii 1-2, laakiinse waxa jirta labo siyaabood oo loo sheegayo arrintaas: (1) Ilaah oo ah abuuraha dunida amaba caalamka iyo (2) Ilaah oo si gaara u abuuray aadanaha. Haddaba, Bilowgii 2:4 ayaa waxay si gaara uga hadlaysaa waxyiga tusinaya ujeeddada loo abuuray aadanaha iyo dhibaataada denbiga ee timid.
2. Bilowgii 4:26 waxaan ku arki karnaa "dadkii waxay bilaabeen inay Rabbiga ku baryaan magiciisa." Haddaba, Baxniintii 6:3 ayaa waxay tilmaamasaa in dadkii hore ee axdigu ay Ilaah u yaqaaneen *El-shaddai* oo keliya. Magaca YEHOWAH ayaa haddaba waxa hal mar lagu sharaxay Baxniintii 3:13-16, gaar ahaan aayadda 14. Si kastaba ha ahaatee qoraaladii Muuse waxay macnaynayaan magacyo, laakiin maaha kuwa Ilaah (Bilowgii 17:5, 27:36; 29:13-35). Haddaba, waxa jira aragtiyo badan oo magacyadan ka tarjumaya (waxa laga soo qaatay IDB, qaybta 2, b 409-11).
 - a. Waxa laga yaabaa in asalkeedu yahay Carabi, oo macnihiisuna yahay 'muujinta jacayl diirran'
 - b. Waxa laga yaabaa in asalkeedu yahay Carabi, oo macnihiisuna yahay 'u soconaya sida dabaysha' (YEHOWAH sida dabaysha Ilaah oo kale)
 - c. Asalkeedu inuu yahay Kancaani 'waxa hadla'
 - d. Ka wax asaasa amaba socodsiiya
 - e. Asal Cibraani ah 'ka uu yahay'
 - f. Asal Cibraani ah 'ka sababa inay wax ahaadaan'
 - g. Asal Cibraani ah 'waxa nool'
 - h. Fahanka Baxniintii 3:13-16 "ANIGU WAXAAN AHAY KAN AHAY". Magaca buuxa ee YEHOWAH waxa uu noqon karaa mid wax laga soo gaabsaday:
 - (1) *Yah* (tusaale ahan, Hallelu-Yah)
 - (2) *Yahu* (magac sida, Ishacyaah)
 - (3) *Yo* (magac sida, Yoo'eel)
3. Magaca axdigu waxa uu Yuhuudda dhexdooda ka ahaa magac quduusa, oo xitaa waxay ka cabsan jireen inay si beena ugu dhawaaqaan, Baxniintii 20:7; Sharciga Kunoqoshiisa 5:11; 6:13. Marii haddaba ka akhriyeen YEHOWAH Axdiga Hore, waxay u akhriyeen 'Rabbi', waana sababta YEHOWAH loogu tarjumay RABBI.
4. Sida El, oo kale ayaa YEHOWAH waxa la xidhiidha erayo kale oo tilmaamaya Axdiga Ilaah la dhigtay Israa'iil. Tusaale ahaan waxa ka mida kuwan:

- a. *YEHOWAH – Yireh* (YEHOWAH wax bixiyaha), Bilwgii 22:14
- b. *YEHOWAH – Rophekha* (YEHOWAH ka ku bogsiya), Baxniintii 15:26
- c. *YEHOWAH – Nissi* (YEHOWAH) Baxniintii 17:15
- d. *YEHOWAH – Meqaddishkem* (YEHOWAH ka ka quduus idinka dhigaya), Baxniintii 31:13
- e. *YEHOWAH – Shalom* (YEHOWAH waa nabad), Xaakinnada 6:24
- f. *YEHOWAH – Sabbaoth* (YEHOWAH) 1 Samuu’eel 1:3,11; 4:4; 15:2
- g. *YEHOWAH – Ro’I*(YEHOWAH waa adhi jirahayga), Sabuurka 23:1
- h. *YEHOWAH – Sidqenu* (YEHOWAH Rabbiga xaqnimada ah), Yeremyaah 23:6
- i. *YEHOWAH – Shammah* (YEHOWAH Rabbigaa halkaas jooga), Yexesqeel 48:35

▣ **“ma haddeer baad boqortooyada u soo celinaysaa Israa’iil?”** ilaa hadda iyagu waxa ay ka hadlayeen dhalashada Yuhuudnimada (cf. Sabuurka 14:7; Yeremyaah. 33:7; Hoosheeca. 6:11; Luukos 19:11; 24:21). Waxa xitaa suurto gal ah in ay xitaa waydiinayeen xilalka ay qaban doonaan.

Su’aashan fiqi ahaaneed waxa ilaa hadda waxa ay keenaysaa iska hor imaad. Waxa aan rabaa in halkan aan soo dhex geliyo tafsiirkayga kitaabka Muujintii (eeg www.freebiblecommentary.org) kaasoo arrintan ka hadlaya.

“Nebiyada Axdiga Hore waxa ay sii sheegeen boqortinmada Yuhuudda oo kusoo laaban doonta kana dhismi doonta Falastiin iyadoo xarunteedu tahay Yeruusaalem halkaasoo quruumaha dunida oo dhama ay isugu iman doonaan isla markaasna ay ugu adeegi doonaan xukunka Daa’uudiga ah, laakiinse Rasuullada Axdiga Cusubi arrintan ma siinayaan marnaba muhiimadda. Axdiga Hore miyaanu ahayn waxyi (Matayos 5:17-19)? Qorayaasha Axdiga Cusubi miyay iskaga tegeen muhiimadda ku jirta dhacdooyinka dhammaadka wakhtiga?”

Waxa jira ilo warbixineed oo dhowr ah isla markaasna ku saabsan dhammaadka dunida:

1. nebiyada Axdiga Hore
2. Qorayaasha Axdiga Hore (cf. Yexesqeel. 37-39; Daanyeel. 7-12)
3. qorayaasha kale ee Yuhuudda (sida I Enoch)
4. Ciise laftiisa (cf. Matayos. 24; Markos 13; Luukos 21)
5. qoraallada Bawlos (cf. I Korintos. 15; II Korintos. 5; I Tesaloniika. 4; II Tesaloniika. 2)
6. qoraallada Yooxanaa (kitaabka Muujintii).

Dhammaan miyay kuwani tusinayaan waxbaris ku saabsan arrinta khusaysa dhammaadka dunida (dhacdooyinka, taariikhda, shakhsiyaadka)? Haddii aanay baraynin, waa maxay sababtu? Dhammaantood miyaanay ahayn waxyi (marka laga reebo qoraallada khuseeya Yuhuudda)?

Ruuxu waxa uu qorayaasha Axdiga Hore u muujiyay runta iyadoo taasi ku dhisan waxyaalaha iyo wakhtiyada ay fahmi karaan. Si kastaba ha ahaatee, waxyi koraya ayaa Ruuxa waxa uu waxyaalahan ku sugan Axdiga Hore waxa uu ka dhigay arrin caalami ah (Efesos 2:11-3:13). Halkan waxa ah tusaalayaal la xidhiidha:

1. Magaalada Yeruusaalem ayaa tusaale ahaan waxa loogu adeegsaday dadka Ilaah (Siyon) waxaana Axdiga Cusub dhexdiisa loogu adeegsaday iyadoo ah eray ka hadlayay aqbalitaanka Ilaah ku aqbalayo dhammaan kuwa towbad keena, aadanaha rumaysadka leh (Yeruusaalemta cusub ee Muujintii 20-22). Fiqiga la xidhiidha magaalada ayaa ah iyadoo dadka Ilaah lagu siiyay ballan qaadka Ilaah ee ah badbaadada aadanaha leexday ee ku sugan Bilwgii 3:15 iyadoo horena caasimad ugu ahayd Yuhuudda. Xitaa yeedhitaankii Ibraahim (Bilwgii 12:3) waxa uu koobsanayaa kuwa aan Yuhuudda ahayn.
2. Axdiga Hore dhexdiisa cadaawayaashu waxa ay ahaayeen ummadihii ku hareeraysnaa Bariga Dhow ee Wakhtigii hore, laakiinse Axdiga Cusub dhexdiisa waxa ay ku dhexgaleen oo ay ku fidday dhammaanba kuwa aan rumaysadka lahayn, ee kasoo horjeeda Ilaah, oo ah kuwa Shaydaanku duufsaday. Dagaalkuna waxa uu iska bedelay goob juquraafi ahaaneed isagoo isu bedelay khilaaf baaxad wayn.
3. Ballan qaadka dhulka ee aadka muhiimadda uuga dhex leh Axdiga Hore imika waxa uu noqday gebi ahaanba dunida oo dhan. Yeruusaalemta cusubi waxa ay noqonaysaa dhul dib loo abuuray, kaasi oon ahayn Bariga Dhow oo keliya amaba aan khaas ahayn (Muujintii 20-22).
4. Tusaalayaal kale oo ka mida Axdiga Hore isla markaasna arrintan la xidhiidha ayaa waxa ay noqon karaan (1) farcanka Ibraahim hadda waxa ay yihiin kuwo ruuxi ahaan gudan (cf. Rooma. 2:28-29); (2) dadka axdiga hadda waxa ka mida xitaa kuwa aan ahayn Yuhuudda (cf. Hoosheeca. 1:9; 2:23; Rooma.

9:24-26; sidoo kale Laawiyiintii. 26:12; Baxniintii. 29:45; II Korintos. 6:16-18 iyo Baxniintii. 19:5; Sharciga Kunoqoshadiisa 14:2;; Tiitos 2:14); (3) macbadku hadda waa kaniisadda maxalliga ah (cf. I Korintos. 3:16) amaba rumaystaha (I Korintos 6:19); iyo (4) xitaa dabeecadda Israa'iil iyo erayada ka hadlayaa waxa ay hadda yihiin kuwo khuseeya gebi ahaanba dadka Ilaah (cf. Galatiya. 6:16; I Butros.2:5, 9-10; Muujintii. 1:6).

Waxyaalihii nebiyadu sii sheegeen waa la dhammaystiray, la fidiyay, imika ayaanay koobsanaysaa waxbadan. Ciise iyo qoraayadii Rasuulladu dhammaadka wakhtiga ugamay hadlin si la mida Axdiga Hore sida ay nebiyadu uugaga hadleen (cf. Martin Wyngaarden, *The Future of The Kingdomin Prophecy and Fulfillment*). Mufasiriinta casriga ah ee qaabkii hore ee Axdiga Hore isugu daya inay ugala mid dhigaan Muujintii, waxa ay yihiin kuwo macnaha qasbaya, waxa ay samaynayaan waxyaalo ka baxsan eraydii Ciise iyo Bawlos! Qorayaasha Axdiga Cusubi maaha kuwo diiddan nebiyada Axdiga Hore, laakiinse waxa ay muujinayaan arrinta caalimiga ah ee ujeedadoodu ahayd.”

1:7

NASB “Dantiinna ma aha inaad ogaataan wakhtiyada iyo xilliyada uu Aabbuhu amarkiisa kaga dhigay”

NKJV “muhiim idiin ma aha inaad ogaataan wakhtiyo”

NRSV “muhiimaddiina maaha inaad ogaataan wakhtiyo iyo xilliyoo”

TEV “wakhtiyada iyo xaaladaha”

NJB “muhiim idiin maaha inaad ogaataan wakhti iyo taariikh”

Erayga “wakhtiyo” (*chronos*) waxa loogala jeedaa “casriyo” ama “goor” (tegitaanka wakhtiga), halka erayga “xilliyoo” (*kairos*) uu macnihiisu ka yahay “xalliyo dhacdooyin gaar ah” (Tiitos 1:2-3). Louw iyo Nida: *Greek-English Lexicon* ku, waxa uu ku sheegayaa inay simanyihiin oo tilmaamayaan wakhti (1 Tesaloniika 5:1). Waxa muuqata in rumaystayaashu aanay isku dayin inay cayimaan wakhti ama taariikh gaar ah; xitaa Ciise muu ogayn wakhtiga soo laabashadiisa (cf. Matayos. 24:36; Markos 13:32). Rumaystayaashu ma ogaan karaan xilliga guud, laakiin waa inay ahaadaan kuwo diyaar u ah dhacdada markasta iman karta (cf. Matayos. 24:32-33). Xoojinta labanlaabka ah ee ku sugan Axdiga Cusub isla markaasna ku saabsan Imaatinka Labaad waxa weeyi in la ahaad kuwo **firfircoon** iyo kuwo **diyaar ah**. Waxa soo hadhay Ilaah ayay u taalla!

1:8 “laakiinse waxaad heli doontaan xoog” Fiiri u yeelo imaatinka Ruuxa Quduuska oo lala xidhiidhiyay xoog iyo markhaati fur. Falimaha Rasuulladu waxa uu ku saabsan yahay “markhaatifur” (*martus*). Fikraddanina waxa weeyi midda uu kitaabku u badanyahay (cf. 1:8,22; 2:32; 3:15; 5:32; 10:39,41; 13:31; 22:15,20; 26:16). Kaniisadda waxa la siiyay shaqadeeda oo ah in ay ka markhaati furto injiilka Masiixa (cf. Luukos 24:44-49)! Rasuulladuna waxay ahaayeen markhaatiyaasha Ciise noloshiishii iyo waxbaristiisii, iminkana waxa ay markhaatiyaal ka ahaayeen wax ku saabsan nolohsiisa iyo waxbaristiisii. Markhaati furka wax ku oolka ahi waxa uu ku iman karaa oo keliya macnaha awoodda Ruuxa.

Waxa xiiso leh iyada oo kitaabka *The Jerome Biblical Commentary* (p. 169) uu wax ka sheegayo Luukos oo janjeedhay inuu wax ka sheego “*paraousia* yada dib dhacday.” Waana tan xigashadu:

“Ruuxu waxa uu beddel u yahay *Parousia*. Tani waa awoodda *alla*, ‘laakiin,’ waa xidhiidhiyaha isku xidhaya labada qaybood ee Ciise kusoo celintiisa. Ruuxu waa nidaamka xidhiidhka ah ee jiritaanka Masiixiga isagoo dhex joogaya taariikh cusub, oo ah midda kaniisadda iyo adeegga. Xaqiiqooyinkani waa in ay beddelaan *Parousia* dii hore iyadoo ah midda muhiimka u ah Masiixiga. Ruuxa kaniisadda ku dhex jiraa waa jawaabka Lucan ka ee dhibaataada dib dhaca *Paruosia* yada iyo sii socoshada taariikhda.”

▣ **“Yeruusaalem...Yahuudiya..... Samaariya... meesha dunida ugu fog.”** Tani waa guud marka goobaha juquraafi ahaaneed ee Falimaha Rasuullada:

1. Yeruusaalem, cutubyada 1-7
2. Yahuudiya iyo Samaariya, cutubyada 8-12
3. meesha dunida ugu fog (Rooma), cutubyada 13-28.

Guudmarkani waxa laga yaabaa inuu wax ka sheegayo qaabka suugaan ahaaneed ee qoraaga iyo ujeedada. Masiixiyaddu maaha qayb ka mida diinta Yuhuudda, laakiinse waa dhaqdhaqaaq caalami ah oo Ilaaha kelida ah ee runta ahu uu ku dhammays tirayo ballan qaadayadiisa Axdiga Hore si uu aadanaha leexday dib uugu soo celiyo in ay isaga weheshadaan (cf. Bilwgii. 12:3; Baxniintii. 19:5; Ishacyaah. 2:2-4; 56:7; Luukos 19:46).

Erayada “meesha dunida ugu fog” markale ayaa lagu adeegsaday 13:17, iyadoo ah xigasho ka ahaatay Ishacyaah 49:6, waana qoraal ku saabsan Masiixa oo sidoo kale tilmaamaya “iftiin u ahaaday quruumaha oo dhan.” Badbaadiyaha (Bilwgii 3:15) quruumuhu (cf. Bilwgii. 12:3; Baxniintii. 19:5-6; Ishacyaah. 2:2-4) hadiyo goor waxa uu ahaa qorshaha Ilaah.

Hoggaamiyayaashii hore ee Yuhuuddu iyaga oo aqoon u lahaa Sebtuujantiga iyo ballan qaadyo badan oo ah kuwii nebiyada ee YHWH isagoo Yerusaaalem dib usoo celin doona, Yerusaaalem dib u kicin doona, dunida u keeni doona Yerusaaalem, waxa ay u malaynayaan in middani ay tahay mid loo fulinayo sida ay u fahmayeen. Waxa ay joogeen Yerusaaalem (8:1). Laakiinse injiilku waxa uu ballaadhiyay fikirka Axdiga Hore ku sugan. Awoodda caalamiga ahi (cf. Matayos. 28:18-20; Luukos 24:47; Fal 1:8) waxay rumaystayaasha u sheegtay in ay tagaan dunida oo dhan, iyagoon sugayn in iyada ay dunidu u timaaddo. Yerusaaalemta Axdiga Cusubi waxay tusaale u tahay janada (Muujintii 21:2), mana aha magaalo ku taalla Falastiin.

MAWDUUC GAAR AH: WACDINTA BOOBKA

Qofka akhriyayow waa inaan kuu qirto in wacdintaydu aanay ahayn mid ku tiirsan madaahib gooni ah, laakiinse waa wacdinta injiilka. Waxa aan rumaysanahay in Ilaah uu badbaadada aadanaha u lahaa qorshe weligiis ah (Bilwgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5-6; Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 18:36:22-39; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28; 13:29; Rooma 3:9-18,19-20,21-32), kuwaas oo uu ka abuuray ekaanshihiisa (Bilwgii 1:26-27). Axdiyaduna waxa ay ku midoobeen Masiixa (Galatiya 3:28-29; Kolosay 3:11). Ciisena waxa uu yahay Ilaah oo qarsoonaa balse imika is muujiyay (Efesos 2:11-3:13)!

Tani waa fahan hore oo ku sugan fasiraadaha Qorniinanada (Yoonis). Waxaan ka wada akhriyay dhammaanba qoraallodooda! Waa mid hubaashii fadirayaasha oo dhammi xiiseeyaan, laakiin Qorriin ahaan waxa lagasoo qaaday run.

1:9 “ayaa sare loo qaaday isagii,” dhacdadan waxa loo yaqaanaa Sare u qaadistii. Ciisaha la sarakiciyay waxa uu ku laabtay meeshii horeba uu ammaanta uugu joogay (cf. Luukos 24:50-51; Yooxanaa 6:22; 20:17; Efesos. 4:10; I Timoteyos. 3:16; Cibraaniyada. 4:14; and I Butros. 3:22).

Fiiro u yeelo farqiiga u dhexeeya loo adeegsaday sara u qaadista:

1. “sare loo qaaday,” aayadda. 2 – fal tegay oo tusamayn xanbaarsan
2. “kor loo qaaday,” aayadda. 9 – fal tegay oo wax tusamaynaya
3. “sare loo qaaday,” aayadda 11 (lamida falka aayadda 2) – fal tegay wakhti hore
4. “samadaa sare loogu qaaday,” Luukos 24:51 (kala duwanaanshaha qoraallada) – fal aan ebyan ahayn. eeg Mawduuca Gaarka ah 1:2.

▣ **“daruur”** daruuruhu waxa ay ahaayeen calaamad muhiim ah. Eeg Mawduuca Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: KA IMANAYA DARUURAHA DUSHOODA

Erayadni waxa ay yihiin marjic muhiim ah u yihiin Imaatinka Labaad ee Masiixa. Ku imaatinkan daruuraha dushoodu waxa uu ahaa calaamad muhiim ah. Waxaana Axdiga Hore loogu dhex adeegsaday saddex siyaabood oo kala soocan.

1. tusitaanka joogitaanka jidh ahaaneed ee Ilaah, *Shekinah* daruurta ammaanta (cf. Baxniintii. 13:21; 16:10; Tirintii. 11:25)
2. qarinta Qudduusnaantiisa si aadanuhu aanay u arag oonay u dhimanin (cf. Baxniintii. 33:20; Ishacyaah. 6:5)
3. iyadoo ah gaadiidka ilaahnimada (cf. Sabuurka 104:3; Ishacyaah. 19:1)

Daanyeel 7:13 daruuraha waxa loogu adeegsaday gaadiidka Masiixa isugu jira ilaaha iyo aadanaha. Waxsii sheegiddan ku sugan Daanyeel waxa Axdiga Cusub loogaga dhex hadlay in ka badan 30 jeer. Masiixa oo daruuraha samada lala xidhiidhinayo mid la mida waxa laga arki karaa Matayos. 24:30; Markos 13:26; Luukos 21:27; 14:62; Fal 1:9,11 iyo I Tesaloniika. 4:17.

1:10 “iyagoo samada aad u fiirinaya” waa fal aan dhammaystirnayn. Waxa ay sii wadeen in ay si aada u sii eegaan si ay Ciise u arkaan inta suurto galka ah. Xitaa markii uu ka qarsoomay aragga, waxa ay sii eegayeen samada.

Eraygani waxa uu caan ku yahay qoraallada Luukos (cf. Luukos 4:20; 22:56; Fal 1:10; 3:4,12; 6:15; 7:55; 10:4; 11:6; 13:9; 14:9; 23:1, Axdiga Cusub dhexdiisa oo ka baxsan Luukos iyo Falimaha Rasuulladana wax laga helayaa labo jeer oo keliya, 2 Korintos 3). Waxa loogala jeedaa “eegis ama fiirin aad ah,” “wax eegis,” ama “qofkoo indhaha lagu gubo.”

▣ **“samada”** dadkii hore waxa ay rumaysnayeen samadu inay sarraysa, laakiinse maalmehaan iyadoo cilmiga dunidu uu horu maray, haddana kor waa ay la xidhiidhaa. Luukos 24:31, Ciise waa uu qarsoomay. Waxa laga yaabaa in middani ay ku habboontahay dhaqankeenna. Samadu maaha kor, laakiinse waxa ay noqon kartaa wakhti kale iyo goob kale. Samadu maaha jiho, laakiinse waa shakhsi!

▣ **“laba nin oo dhar cadcad qaba”** Axdiga Cusubi badanaa malagyada waxa uu ku tusmaynayaa iyagoo dhar caddaan ah qaba, (cf. Luukos 24:4; Yooxanaa 20:12). Malagyadu waxa ay muuqdeen dhalashadiisii, jarribaadiisii, Getsamaane dhexdeeda, markii xabaasha, iyo halkan oo ahayd sare u qaadistiisii.

1:11 “Nimankiinan reer Galiliyow” marar dhowr ah ayaa Luukos waxa uu Falimaha Rasuullada dhexdooda ku diiwaan gelinayaa asalnimada Galiliyaanka ee xerta (cf. 2:7; 13:31). Dhammaanba Labo iyo Tobankii xertu marka laga reebo Yuudas Iskariyod, waxa ay kasoo jeedeen Galile. Goobtani waxa ay ahayd mid dadka Yahuudiya ay yasaan maxaa yeelay waxa ku noolaa dad badan oo aan ahayn Yuhuud, manay ahayn sida “Kosher” (degmo) lagaga dhaqmi jiray Talmuudka.

Waxa lala yaabi karaa haddii Luukos uu isku beddelkan ku qaabeeyay isagoo ka jawaabayaa su’aalo ku saabsan raagitaanka Imaatinka Labaad. Masiixiyiintu maaha in ay muhiimadda siiyaan *Parousia* da laakiin waa inay siiyaan adeegga, wacdinta, iyo faafinta injiilka.

▣ **“Ciisahan... iman doonaa.”** Kuwo ka mida fuqahada ayaa isku daya in ay kala saaraan “Ciise” iyo “Masiixa.” Malagyadani waxa ay sheegayaan in Ciisahan ay yaqaaneen uu soo laaban doono. Masiix la sara qaaday weli waxa uu yahay Masiixa ah Ciisaha reer Naasereet ee ammaan. Waxa uu ahaan doonaa Ilaah/aadane.

Ciise sidii uu u tegay ayuu usoo laaban doonaa, isagoo ka iman doona daruuraha samada (eeg Mawduuca Gaarka ah 1:9, cf. Matayos. 10:23; 16:27; 24:3,27,37,39; 26:64; Markos 8:38-39; 13:26; Luukos 21:27; Yooxanaa 21:22; I Korintos. 15:23; I Tesaloniika. 1:10, 4:16; II Tesaloniika. 1:7, 10; 2:1,8; Yacquub 5:7-8; II Butros. 1:16; 3:4,12; I Yooxanaa 2:28; Muujintii. 1:7). Imaatinka Labaad ee Ciise waxa weeyi arrin kusoo noqnoqonaysa oo ka muuqanaysa Axdiga Cusub. Sabab ka mida injiilka qoritaankiisa oo wakhti dheer qaatay, waxa ka mid ahaa kaniisaddii hore oo rajaynaysay Masiixa oo si dhakhsaha u soo laaban doona. Dib u dhicitaankiisa la yaabka leh, dhimashada Rasuullada, iyo bidcooyinka oo soo if baxay ayaa dhammaantood waxa ay kaniisaddii hore ku kalliftay in ay wax ka diiwaan geliyaan noloshii iyo waxbaristii Ciise.

NASB (UPDATED) TEXT: 1:12-14

¹²Markaasay Yerusaaalem ku noqdeen iyagoo ka yimid buurtii Saytuun la odhan jiray, oo u dhowayd Yerusaaalem, oo u jirtay maalin Sabtiyeed socodkeed. ¹³Oo markay magaaladii galeen, waxay aadeen qolladdii sare, meeshay joogi jireen Butros iyo Yooxanaa iyo Yacquub iyo Andaros, iyo Filibos iyo Toomas, iyo Bartolomayos, iyo Matayos, iyo Yacquub ina Alfayos, iyo Simoon Qiiroleh, iyo Yuudas ina Yacquub. ¹⁴Kuwaas oo dhammu, iyagoo isku wada qalbi ah, ayay ku sii adkaysteen tukasho, iyaga iyo dumarka, iyo Maryan oo ahayd Ciise hooyadiis, iyo walaalihiis.

1:12 “ku noqdeen” Luukos 24:52 waxa uu ku darayaa “farxad wayn”

▣ **“buurtii Saytuun la odhan jiray”** waxa ay middani u muuqataa in ay khilaafayso Luukos 24:50 (Beytaniya); si kastaba ha ahaatee, waxa aad is barbar dhigtaa Luukos 19:29 iyo 21:37 iyo Markos 11:11-12 iyo 14:3. Buur

Saytuun waxa ay 2.5 mayl ay ka fogayd Yerusalaam marka laga yimaaddo Beytaniya oo kasoo horjeeda Dooxada Kidron, marka laga tallaabo Macbadka. Waxa lagu sheegay waxsii sheegista Axdiga Hore (Sekeryaah 14:4). Ciise waxa uu xerta halkaas kula kulmayo marar badan.

▣ **“oo u jirtay maalin Sabtiyeed socodkeed”** masaafada uu qofka Yuhuudiga ahi socon karo maalintaa Sabtida waxa dejin jiray Rabbaaniyiinta (Baxniintii 16:29; Tirintii 35:5). Waxa ay ahayd masafo lagu qiyaasi karo ilaa 2,000 oo tallaabo, taasi oo ay dejin jireen Rabbaaniyuuntu iyadoo aanu qofku dhaafi karin isla markaasna aanu jebinin Sharciga Muuse.

1:13 “qolladdii sare” tani waxa ay ahayd meeshii ay ku qaateen Cashadii ugu Danbaysay (cf. Luukos 22:12; Markos 14:14-15). Dhaqanku waxa uu sheegayaa in ay ahayd meel sar (dabaqa labaad ama saddexaad) ee gurigii Yooxanaa Markos (Fal 12:12), kaasoo waxyaalihii Butros xusuusnaa ku qoray Injiilka Markos. Waxa ay ahayd baa laga yaabaa qol wayn oo deeqi karaya ilaa 120 shakhsi.

▣ **“iyagu”** waxa ay ka mid tahay afar liis oo lagu diiwaan geliyay Rasuullada (cf. Matayos. 10:2-4; Markos 3:16-19; iyo Luukos 6:14-16). Liisaskani maaha kuwo isku mid ah. Magacyada iyo siday u habaysan yihiinna way kala duwan yihiin. Si kastaba ha ahaatee, hadiyo goor waa shakhsiyaad isku mid ah oo ah afar ama saddex kooxood. Butros hadiyo goor wuu ugu horreeya halka Yuudasna uu uugaga danbeeyo. Saddexdan kooxood ee ka midka ah afartu waxa laga yaabaa ujeedada loogu oggolaaday in ay dib u laabtaan in ayahayd si ay usoo hubiyaan qoysaskooda. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: JADWALKA MAGACYADII RASUULLADA

	Matayos 10:2-4	Markos 3:16-19	Luukos 6:14-16	Fal 1:12-18
Kooxda Hore	Siimon(Butros) Andros (Butros walaalkii) Yacquub (ina Sebedi) Yooxanaa (Yacquub walaalkii)	Simon (Butros) Yacquub (ina Sebede) Yooxanaa (Yacquub walaalkii) Andros	Simon (Butros) Andros (Butros walaalkii) Yacquub Yooxanaa	Butros Yooxanaa Yacquub Andros
Kooxda Labaad	Filibos Bartolomayos Toomas Matayos (cashuur qaadihii)	Filibos Bartolomayos Matayos (cashuur qaadihii) Toomas	Filibos Bartolomayos Matayos Toomas	Filibos Toomas Bartolomayos Matayos
Kooxda Sadexaad	Yacquub (ina Alfayos) Tadayos Simon (reer Kaana) Yuudas (Iskariyot)	Yacquub (ina Alfayos) Tadayos Simon (reer Kaana) Yuudas (Iskariyot)	Yacquub (ina Alfayos) Siimon (Qiirooleh) Yuudas (ina Yacquub) Yuudas (Iskariyot)	Yacquub (ina Alfayos) Siimon (Qiiroole) Yuudas (ina Yacquub)

▣ **“Butros”** badanaa Yuhuuddii reer Galili waxa ay lahaayeen magac Yuhuudi ah (e.g., Simon ama Simcon [BDB 1035, cf. Bilowgii. 29:33], macnihiisuna yahay “maqlitaan”) iyo magac Giriig ah (kaasoo weligiis aan lala bixin). Ciise waxa uu ii saga naanays uuga dhigay “dhagax.” Luqada Giriiggana waxa weeyi *petros* iyadoo Aramaatigana ku ah *cephas* (Yooxanaa 1:42; Matayos 16:16).

▣ **“Anderos”** Macnihiisa Giriigga waxa weeyi “raganimo.” Yooxanaa 1:29-42 waxa aan ka baranaynaa iyada oo Andros uu ahaa xertii Yooxanaa Baabtiisaha iyo in walaalkiis Butros uu baray Ciise.

▣ **“Filibos”** Giriigga waxa uu macnihiisu ku yahay “jeclaanshaha fardaha.” Yeedhitaankiisu waxa uu ku xusan yahay Yooxanaa 1:43-51.

▣ **“Tomas”** eraygan Cibraaniga ah macnihiisu waa “mataa” ama Didymus (cf. Yooxanaa 11:16; 20:24; 21:2).

▣ **“Bartolomayos”** waxa macnihiisu yahay “Ina Ptolemy.” Waxa laga yaabaa inuu ahaa Natana’eel (hadiyadda Ilaah, BDB 681 iyo 41) ee Injiilka Yooxanaa (cf. Yooxanaa 1:45-49; 21:20).

▣ **“Matayos”** waxa suurto gal ah inuu la xidhiidho magac Cibraani ah *Mattenai*, oo macnihiisu yahay “hadiyadda YHWH” (BDB 683). Waana magaca kale ee Laawi (cf. Markos 2:14; Luukos 5:27).

▣ **“Yacquub”** waa magaca Cibraaniga ah ee “Yacquub” (BDB 784, cf. Gen. 25:26) waxa jira labo nin oo lagu magacaabay Yacquub isla markaasna ku jira liiska Labo iyo Tobanka. Mid waa Yooxanaa walaalkiis (Markos 3:17) waxaanu ka mid ahaa qaybtii guduha (Butros, Yacquub, iyo Yooxanaa). Waxaana loo yaqaanay Yacquubka yar.

▣ **“Simoon Qiirroleh”** Qoraalka Giriigga ah ee Markos waxa uu dhigayaa “Cananean” (Matayos 10:4). Markos oo Injiilkiisa loo qoray Roomaanka, waxa laga yaabaa in aanu rabin sababo siyaasadeed aawadeed “qiirroleh,” kaasi oo lagu tilmaami jiray Yuhuudda kasoo horjeeday dhaqdhaqaaqa Roomaanka. Luukos isagu laakiin eraygan waa uu ku magacaabay (cf. Luukos 6:15 iyo Fal 1:13). Erayga “Cananean” waxa laga yaabaa in laga soo dheegtay dhowr waxyaalood:

1. agaraarka Galile loona yaqaanay Cana
2. Axdiga Hore adeegsigiisa Canaanite sida ganacsade
3. iyadoo guud ahaan la xidhiidha Canaan.

Haddii Luukos sida uu ku sheegayaa ay tahay sax, markaa “qiirroleh” waxa ay ka imanaysaa eragay Aramaatiga ah ee “entusiast” (cf. Luukos 6:15; Fal 1:17). Ciise waxa uu doortay labo iyo toban xer ah kuwaas oo kasoo kala jeeday kooxo kala duwan. Simon waxa uu xubin ka ahaa dhaqdhaqaaqii kasoo horjeeday ee u ololaynayay in laga takhaluso xukuumadda Roomaanka. Caadi ahaan Siimonkan iyo Laawi (Matayos, cashuur qaadihii) may ahaan karin kuwo isugu yimaadda meel oo kulma.

▣ **“Tadayos”** waxa sidoo kale loogu yeedhi jiray “Lebbeus” (“ninka qalbiga” Matayos 10:3) ama “Yuudas” (cf. Luukos 6:16; Yooxanaa 14:22; Fal 1:13). Tadayos macnihiisu waa “ilmaha la jecelyahay” (xagga naaska).

▣ **“Yuudas Iskariyod”** waxa jira labo Simon, labo Yacquub, iyo labo Yuudas. “Iskariyo” waxa laga yaabaa inuu kasoo jeedo labo meelood oo suurto gal ah: (1) ninka Kerioth ee Yahuudah (Yashuuca 15:23) ama (2) “ninka middida” ama shirqool, taasoo macneheedu yahay inuu ahaa qiirrole, sida Simon oo kale.

MAWDUUC GAAR AH: ISKARIYOD

Yuudas waxa uu dhegaystay, u fiirsaday, oo la joogay weheshina la sameeyay Sayid Ciise sanado dhowr ah, laakiinse haddana ilaa hadda muu shakhsi ahaan ula lahayn xidhiidh rumaysad ah (Matayos 7:21-23). Butros laftiisa ayaa xoogaa jarriibaad ahi ku jirtay sida Yuudas oo kale, laakiin waxay ahayd mid natiijadeedu ka duwantahay. Dood badan ayaa ka taagan ujeedadii Yuudas iyo khiyaanadiisii:

1. Waxay ahayd sabab dhaqaale raadis (Yooxanaa 12:6)
2. Waxay ahayd arrin siyaasadeed (William Klassen, *Judas Betrayer or Friend of Jesus?*)

3. Waxay ahayd ruux ahaan (Yooxanaa 13:27)

Dhinaca ku saabsan saamaynta Shaydaanka waxa jira ilo wanaagsan oo dhora kana hadlayay arrinta (waxa loo kala horrasysiiyay sida aan ugu kala kalsoonahay).

1. Merrill F. Unger, kitaabkiisa *Biblical Demonology, Demons in the World Today*
2. Clinton E. Arnold, kitaabkiisa *Three Crucial Questions About Spritual Warfare*
3. Kurt Koch, kitaabkiisa *Christian Counseling and Occultism, Demonology Past and Present*
4. C. Fred Dickason, kitaabkiisa *Demon Possession and the Christian*
5. John P. Newport, kitaabkiisa *Demons, Demons, Demons*
6. John Warwick Montgomery, kitaabkiisa *Principalities and Powers*

Ka taxadir arrimaha la xidhiidha dhaqamada. Shaydaanku wuxuu Butros ku saamaynayaa Matayos 16:23 isagoo isku dayaya inuu Ciise ka hor istaago dhimashadiisa ujeeddada ku socota. Shaydaanku marwalba sida ugu suurto galsan wuxuu isku dayay inuu Ciise ka hor istaago shaqadiisa badbaadaba ah ee inaga darteen uu u dhimanayay.

1. Jarribaaddii Ciise, Luukos 4
2. Wuxuu adeegsaday Butros
3. Wuxuu adeegsaday Yuudas iyo gudigii Sehadriinka

Xitaa Ciise wuxuu Yuudas ku tilmaamayaa shaydaan sida ku xusan Yooxanaa 6:70. Kitaabku kama hadlayo shaydaanka iyo saamaynta uu ku yeelan karo rumaystayaasha, laakiinse waxa saamayn ku yeelanaya rumaystayaasha sharkooda shakhsi ahaaneed iyo doorashadooda.

1. *Kerioth*, magaaladii Yahuudah (Yashuuca 15:25)
2. *Kartan*, magaalo ku taalla Galiili (Yashuuca 21:32)
3. *Karōides*, caleemo geed ku yaal Yerusaaalem ama Jeriko
4. *Scortea*, kiish harag ah (Yooxanaa 13:29)
5. *Ascara*, is deldelid (Cibraani) Matayos 27:5
6. middida shirqoolaha (Giriig), oo macneheedu yahay inuu ahaa Qiiroole Siimoon oo kale ah (Luukos 6:15).

1:14 “Kuwaas oo dhammu, iyagoo isku wada qalbi ah,” erayadani waxa ay tusinayaan “sinaansho” (*homo*) iyo “caadifadda maanka” (*thumos*). May ahayn wax isaga dhaca sida la rabo oo is bedbedela. Fikirkan marar badan ayaa lagu dhex sheegay Falimaha Rasuullada (i.e., rumaystayaasha, cf. 1:14; 2:46; 4:24; 5:12; 15:25; iyo kuwo kaloo ku sugan 7:57; 8:6; 12:20; 18:12; 19:29).



NASB “ku sii adkaysteen tukasho”

NKJV “kusii adkaysteen”

NRSV “si joogto ah u tukanaya”

TEV “isu wada yimaaddeen”

NJB “si joogto ah isugu yimaaddeen”

Erayada (*pros* iyo *kaptereo*) waxa loogala jeedaa in wax la doono. Luukos marar badan ayuu adeegsanayaa (cf. 1:14; 2:42,46; 6:4; 8:13; 10:7). Waana fal wakhti xaadirka jooga.

▣ **“iyaga iyo dumarka”** waxa jiray koox dumar ah oo la socdaalay isla markaasna daryeelay Ciise iyo Rasuullada (cf. Matayos. 27:55-56; Markos 15:40-41; Luukos 8:2-3; 23:49; iyo Yooxanaa 19:25). Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: DUMARKII LA SOCDAALAY CIISE IYO XERTIISA

Matt. 27:55-56	Mark 15:40-41	Luke 8:2-3; 23:49	John 19:25
Maryantii Magdala, Maryan, Yacquub iyo Yoosef hooyadood Ilma Sabade (Yacquub iyo Yooxanaa) hooyadood	Maryantii Magdala Maryan, Yacquub yare iyo Yoosee hooyadood Salomee	Maryantii Magdala Yo'anna, xaaskii Chuza (Herod's steward) Susanna iyo kuwo kale	Maryan, Ciise hooyadiis Habaryartiis Maryan, xaaskii Kaloobaas Maryantii Magdala

Faalladani waxa ay ku sugantahay dumarkii Ciise raacay ee tafsiirkayga Markos 15:40-41:

“**Waxaana joogay dumar meel fog ka eegayay**” kooxdii rasuullada waxa u adeegaysay oo dhaqaalaynayay dumar dhowr ah (cunto karinta, dhar dhaqista, iwm, aayadda 41; Matayos. 27:55; Luukos 8:3).

“**Maryantii Magdala**” Magdala waxa ay ahayd tuulo yar oo ku taallay badda Galiile, waxaanay saddex mayl waqooyi ka xigtaa Tiberias. Maryan waxa ay Ciise kasoo raacday Galiile kaddib markii uu iyada ka saaran jin (Luukos 8:2). Iyadoo caddaalad darro ah ayaa waxa lagala mid dhigay dhillo laakiin ma jirto caddayn Axdiga Cusub ah oo arrintan ku saabsan.

“**Maryan oo ahayd Yacquub Yare iyo Yoosee hooyadood**” Matayos 27:56 dhexdiisa waxa loogu yeedhay “Yacquub iyo Yosef hooyadood.” Sida ku sugan Matayos 28:1 waxa loogu yeedhay “Maryantii kale.” Su’aashu waxay tahay haddaba yaa qabay iyada? Yooxanaa 19:25 dhexdiisa waxa suurto gal ah inuu qabay Kaloobaas, laakiise haddana wiilkeeda Yacquub, waxa lagu sheegay “in Alfayos” (cf. Matayos. 10:3; Markos 3:18; Luukos 6:15).

“**Salome**” Waxa ay ahayd Yacquub iyo Yooxanaa hooyadood, kuwaas oo ka mid ahaa kooxdii gaarka ahayd ee Ciise, waxaanay ahayd xaaskii Sebede (cf. Matayos. 27:56; Markos 15:40; 16:1-2).

Faalladan soosocotaa waxa ay ku saabsan tahay dumarkii Ciise raacay waana sida ku xusan tafsiirkayga Yooxanaa 19:25

“**Waxaa Ciise iskutallaabtiisa ag taagnaa hooyadiis, iyo habaryartiis, Maryan afadii Kaloobaas, iyo Maryan tii reer Magdala**” waxa in badan lagu dooda haddii magacyada dumarku yihiin afar ama saddex. Waxa la xoojinayaa in afar haweena magacyadood ay yihiin, maxaa yeelay suurto gal maaha in magac Maryan labo walaalo ah loogu wada yeedho. Maryan walaasheed waxa la odhan jiray Salomee sida ku sugan Markos 15:40 iyo Matayos 27:56, taasina waxa ay ka dhigantahay in Yacquub, Yooxanaa, iyo Ciise ay ahaayeen habro wadaag. Dhaqankii qarnigii labaad (*Hegesippus*) ayaa sheegaya in Kolobas uu ahaa Yuusuf walaalkiis. Maryantii reer Magdalana waxay ahayd tii Ciise uu ka saaray todobada Shaydaan, waxaanay ahayd qofkii u horreeyay ee aragtay Ciise markuu dhimashada kasoo sara kacay (20:1-2; 11-18; Markos 16:1; Luukos 24:1-10).

▣ “**walaalihiis**” waxa aan garanaynaa kuwo ka mida Ciise walaalihiisa badhka ahaa: Yuudas, Yacquub (eeg Mawduuca Gaarka ah 12:17), iyo Simon (cf. Matayos. 13:55; Markos 6:3 iyo Luukos 2:7). Mar ayaa waxa ay ahaayeen kuwo aan lahayn rumaysad (Yooxanaa 7:5), Laakiin imika waxa ay ka mid ahaayeen xerta. Falaqayn xiiso leh oo ku saabsan taariikhda caqiidada “bikranimada wakhtiga dheer ah” ee Maryan, ka eeg F. F. Bruce, *New International Commentary, Acts*, p. 44, fiirada 47.

NASB (UPDATED) TEXT: 1:15-26

¹⁵Oo wakhtigaas ayaa Butros walaalaha dhexdooda istaagay (oo waxaa wada jiray dad badan oo qiyaastoodu ahayd boqol iyo labaatan); markaasuu yidhi, ¹⁶Walaalayaalow, waxaa waajib ahaa in Qorniinku noqdo, kaas oo Ruuxa Qoduuska ahu waagii hore afka Daa'uud kaga hadlay waxa ku saabsan Yuudas oo ahaa kii waday kuwii qabtay Ciise. ¹⁷Maxaa yeelay, isaga waa laynagu tirshay, oo shuqulkan ayuu qaybtiisii helay. ¹⁸Haddaba ninkaasu meel ayuu ku iibsaday abaalgudka xaqdarradiis; oo intuu madax madax u dhacay ayuu dhexda ka kala dillaacay, oo mindicirkiisii oo dhammuna waa ka soo daatay. ¹⁹Kolkaasaa kuwii Yerusaleem joogay oo dhammu ay wada ogaadeen; sidaas daraaddeed meeshaas waxaa afkooda loogu bixiyey Akeldama, taas oo micneheedu yahay, meeshii dhiigga. ²⁰Waayo, waxaa kitaabkii Saburrada lagu qoray, Gurigiisu cidla' ha noqdo, Ninnana yuusan meeshaas degin; iyo Wakiilnimadiisa mid kale ha qabto. ²¹Haddaba nimankii inala socday wakhti kasta intuu Rabbi Ciise ina soo dhex galay, innagana dhex baxay. ²²oo ka bilaabmay baabtiiskii Yooxanaa ilaa maalintii sare laynooga qaaday isaga. iyagii midkood waa inuu markhaati inagala ahaado sarakiciddiisa. ²³Markaasay laba iska soo saareen, kuwaas oo ahaa Yuusuf oo la odhan jiray Barsabaas ee naanaytiisu ahayd Yuustos, iyo Matiyas. ²⁴Kolkaasay tukadeen oo yidhaahdeen, Rabbow, adigoo garanaya qalbiga dadka oo dhan. na tus labadan kaad dooratay, ²⁵inuu galo meeshii shuqulkan iyo rasuulnimadan oo Yuudas ka dhacay inuu meeshiisa tago. ²⁶Markaasay u saami riteen; saamigiina wuxuu ku dhacay Matiyas; oo isagana waxaa lagu daray koob-iyto-bankii rasuul.

1:15 “wakhtigaas” waxa macno ahaan ay noqonaysaa “maalmahaas dhexdooda” (*en tais h'merais*) ereyadanna waxa in badan lagu adeegsaday cutubyada furitaanka ah ee Falimaha Rasuullada Acts (cf. 1:15; 2:18; 5:37; 6:1; 7:41; 9:37; 11:27; 13:41). Luukos waxa uu adeegsanayaa ilo kale oo ah markhaati goob joog ah. Sidoo kale waxa uu si guud ahaaneed u adeegsanayaa “maalinba maalin kaddib” (*kath'h'meran*), isaga oo wakhti ahaan ugu adeegsanay cutubyada ugu horreeya Falimaha Rasuullada (cf. 2:46,47; 3:2; 16:5; 17:11,31; 19:9). Kaddib cutubka 15 Luukos wuxuu ogaaday dhacdooyin badan oo uu diiwaan gelayay. Weli waxa uu adeegsanayaa “maalin” badanaa, laakiin maaha sida ay badanaa ku tahay ereyadan.

▣ **“ayaa Butros walaalaha dhexdooda istaagay”** Butros waxa uu ahaa af hayeenka Rasuullada (Matayos 16). Isaga ayaa wacdintii ugu horraysay ee kaniisadda sameeyay kaddib markii uu yimid Ruuxu (Fal 2) iyo wacdintii labaad sida ku sugan Fal 3. Ciise waxa uu ugu horrayn wuxuu isaga u muuqday sara kicista dabadeed (Yooxanaa 21 iyo I Korintos 15:5). Magaciisa Cibraaniga ahi waa “Simcon” (cf. Fal 15:14; II Butros. 1:1). Magacan waxa loo qoraa “Simon” xagga Giriigga. Erayga “Butros” waxa weeyi Giriig (*pertos*) waxaana lagu magacaaba “dhagaxa la soocay.” Waa “Keefaas” ama “dhagaxa asaaska” Aramaatiga (Matayos 16:18).

▣ **“oo waxaa wada jiray dad badan oo qiyaastoodu ahayd boqol iyo labaatan”** erayadani qaws ayay ku dhex jiraa UBS⁴ ka qoraalka Giriigga (laakiin maya aayadaha 18-19). Kooxdani waxa ay isugu jireen kow iyo tobanka Rasuul, dumarkii la socday Ciise, iyo xer kale oo ahaa kuwii Ciise kusoo raacay wacdintiisa ama adeegiisa uu dadka ku bogsiinayay.

1:16 “Qorniinku” dhammanba maraajicda “Qorniin” ee Axdiga Cusub (marka laga reebo II Pet. 3:15-16) waxa ay tilmaamaysaa Axdiga Hore (Matayos. 5:17-20; II Timoteyos. 3:15-17). Sidoo kale qaybtani waxa ay tilmaamaysaa waxyiga Ruuxa Quduuska ah (II Butros 1:21) ee Daa'uud. Sidoo kale waxa lagu sheegaa “Qoraallada” qayb ka mida Kitaabka Cibraaniga.

MAWDUUC GAAR AH: WAXYIGA

Rumaysadka “marqudha u ahaaday dhammaan” waxa uu tilmaamayaa xaqiiqooyinka, caqiidooyinka, waxbarista aragtida dunida ee Masiixiyadda (2 Butros 2:21). Rumaysadka marka keliya la bixiyay waxa uu xoojinayaa fiqiga aasaaska u ah kitaabka ee xaddidaya waxyiga ku sugan qoraallada Axdiga Cusub mana

ogola in qoraallo kale oo ka danbeeyay ay noqdaan kuwo waxyi ah. Waxa jira wax ka badan hal suurtaggal, aan hubaal ahayn oo ku sugan Axdiga Cusub, laakiinse rumaystayaashu waxay qirsan yihiin in wax kata oo khuseeya rumaysadka isla markaasna loo baahdaa ay ku sugan yihiin Axdiga Cusub dhexdiisa.

Fikirkan waxa lagu saleeyay waxa lagu magaacbo “waxyiga saddex xagal ka ah”

1. Ilaah waxa uu isku muujiyay taariikhda (MUUJIN)
2. Waxa uu doortay dad khaas ah oo qora sharraxaadna ka bixiya wax qabadkiisa (WAXYI)
3. Waxa uu Ruuxiisa siiyay maskaxda iyo qalbiyada furan ee aadanaha si ay qoraalladan u fahmaan, taasi oo u ahaatay badbaadada iyo nololaha Masiixiga (ILHAAMIN).

Muhiimadda halkan ku jirta ayaa in waxyigu uu yahay mid u xadaysan qorayaasha Qorniinka. Ma jiraan qoraallo kale, riyooyin, ama muujin kale oo intaas dhaafsiisani. Albaabku wuu xidhanyahay, waxaan haysanaa dhammaanba xaqiiqada aan u baahi qabno si aan uuga jawaaba celino isla markaasna aan u noqono kuwo ku farxa Ilaah.

Xaqiiqadani waxa weeyi midda ugu wanaagsan ee ay isku waafaqeen qorayaasha kitaabku taasi oo kasoo horjeedda waafaqid la'aanta rumaystayaasha cibaadada leh. Ma jiro qoraa ama hadal yaqaan casriga jooga oo haysta hoggaanka ay lahaayeen qorayaasha Qorniinku.

▣ **“waxaa waajib ahaa”** tani waa *dei*, taasi oo macneheedu yahay lagama maarmaanim. Waa fal aan ebyan ahayn waxna tusmaynaya isagoo tilmaamaya xigashada ugu horraysa ee aayadda 20. Eraygan waxa uu caan ku yahay dareenka Luukos ee nolsoha Ciise iyo kaniisaddii hore oo ah fidinta Qorniinka Axdiga Hore (cf. Luukos 18:31-34; 22:37; 24:44). Luukos eraygan badanaa wuu adeegsanayaa (cf. Luke 2:49; 4:43; 9:22; 11:42; 12:12; 13:14,16,33; 15:32; 17:25; 18:1; 19:5; 21:9; 22:7,37; 24:7,26,44; Acts 1:16,21; 3:21; 4:12; 5:29; 9:6,16; 14:27; 15:5; 16:30; 17:3; 19:21,36; 20:35; 23:11; 24:19; 25:10,24; 26:9; 27:21,24,26). Eraygan macnihiisu waxa weeyi “waa lagama maarmaan,” “waa muhiim.” Injiilka iyo koritaankiisu maaha jaanis imanaya, laakiinse qorshaha Ilaah iyo dhammaystirka Qorniinka Axdiga Hore (isticmaalka LXX).

▣ **“noqdo”** marka qof uu akhriyo xigashooyinkan Axdiga Hore (aayadda 20), gacan gelinta Yuudas may ahayn ujeedada qoraaga Sabuurka (i.e., Sabuurka. 69:25; 109:8). Rasuulladu waxa ay fasireen Axdiga Hore iyaga oo ku salaynaya khibradda ay la yeesheen Ciise, waxaana middan lagu magacaabaa fasiraadda nooca (aayadda 20). Ciise laftiisa ayaa tusaale middan u sameeyay markii uu la socday ee uu la hadlayay labadii kusii socday Emmaus (cf. Luukos 24:13-35, gaar ahaan aayadaha 25-27). Fasirayaashii Masiixiyiintii hore waxa ay arkeen sinaanshaha u dhexeeya dhacdooyinka Axdiga Hore iyo nololaha Ciise iyo waxbaristiisa. Waxa ay arkeen Ciise oo dhammaystiray waxyaalaha nebiyadu kusii sheegeen Axdiga Hore. Rumaystayaasha maantuna waa in ay ka digtoonaadaan qaabkan! Qorayaasha Axdiga Cusub ee loo waxyooday waxa ay aahen kuwo ku hoos nool waxyiga isla markaasna garanayay nololaha iyo waxbaristii Ciise. Haddaba innagu waxa aan qiraynaa xaqiiqada iyo awoodda uu leeyahay markhaatigoodu laakiin dib uma soo saari karno qaabkoodii.

MAWDUUC GAAR AH: ISU EKAYSIIIN

Philo iyo kaniisaddii hore adeegsigeeda sawirka iyo Bawlos adeegsigiisa la midka ahi waa uu kala duwan yahay. Ka hore waxa uu gebi ahaan iska indho tiray dhacdooyinka taariikheed, isagoo horu marinaya waxbaris gebi ahaanba ajnebi ku ah ujeeddadii qorayaasha asalka ah. Qaabka Bawlos ayaa ah ka wanaagsan ee ka tarjumaya isku ekaysiinta. Bawlos waxa uu u fiirsaday dhacdooyinka taariikh ahaaneed ee Bilowgii iyo midnimada ka dhaxaysa Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub, sidaasi darteedna waxa uu awooday inuu dhiso isu ekaansho ka dhexeeya maxaa yeelay qoraagoodu waa mid keliya oo ah Ilaah. Macnahan gaarka ah, Bawlos waxa uu isku barbar dhigayaa Axdigii Ibraahim iyo Axdiga Muuse waxaanu sawirayaa ku dabiqitaankooda Axdiga Cusub ee Yeremyaah 31:31-34 iyo Axdiga Cusub. Afar xidhiidh oo ku sugan 4:21-31 ayaa laga sawiri karaa.

1. labada hooyo waxay u taagan yihiin labo qoys; mid waxa loo sameeyay dabiici ahaan, ka kalena waxa loo sameeyay ballan qaad cajiib leh
2. waxa jiray dareen u dhexeeyay labadan hooyo iyo carruurtooda sida uu dareenkuba u dhex yaallay farriinta Judaizer iyo injiilka Bawlos
3. labada kooxoodba waxay sheegteen inay yihiin farcanka Ibraahim, laakiinse mid waxa uu hoos joogay Sharciga Muuse ka kalena wuxuu xor ku noqday shaqada Masiixu dhammays tiray
4. Labadan axdiga waxa la xidhiidhay labo buurood oo kala duwan, Buur Siinay oo la jirtay Muuse iyo Buur Siyon oo la jirtay Ibraahim. Buur siyon ama Buur Moriyah waxay ahayd meeshii Ibraahim uu rabay inuu Isxaaq ugu bixiyo qurbaan ahaanta (Bilowgii 22), halkaasoo markii danbe noqotay Yerusaaalem.

Ibraahim waxa uu raadinayay magaalo janada ah (Heb. 11:10; 12:22; 13:14, New Jerusalem, Isaiah 40-66) manay ahayn Yerusaaalemta dhulka.

Bawlos waxa uu adeegsaday isu ekaysiintan sababtoo ah

1. macallimtiina beenta ahi waxay adeegsadeen qaab sidan oo kale ah iyagoo sheeganaya inay yihiin farcanka runta ah ee Ibraahim.
2. macallimiinta beenta ahi waxa laga yaabaa inay adeegsadeen sawirka qoraallada Muuse si ay u meel mariyaan fiqigooda axdiga Yuhuudda ah sidaasi darteedna Bawlos waxa uu adeegsanayaa aabbaha rumaysadka Yuhuudda, Ibraahim.
3. Waxa laga yaabaa in Bawlos uu adeegsaday sababta Bilowgii 21:9-10, taasi oo lagusoo xigtay aayadda 30 lehna, “eri” wiilka dabiiciga ah; isu ekaysiinta Bawlosna middani waxay sheegaysaa Yuhuudda.
4. Waxa laga yaabaa sababta uu Bawlos u adeegsaday inay tahay macallimiinta beenta ah ee Yuhuudda oo khaas iska dhigayay, gaar ahaan waxay iska soocayeen kuwa aan Yuhuudda ahayn; sida ka muuqata isu ekaysiinta Bawlosna kuw aan Yuhuudda ahayn waa la aqbalay kuwa cirqiga isku hallaynayana waxa diiday Ilaah (Matayos 8:11-12)
5. Bawlos waxa laga yaabaa inuu isu ekaysiintay u adeegsaday waayo wuxuu xoojinayay “wiilnimada” iyo “dhaxalka cidda leh” sida ku sugan cutubyada 3 iyo 4. Tanina waxa ay ahayd halbowlaha doodiisa: Ilaah waxa aan carruurtiisa ku noqon karnaa rumaysadka Ciise oo keliya, mana aha dhaxaltooyo kale ama cirqi.

▣ **“Yuudas”** waxa ay ahayd Yuudas khiyaanadiisii, oon ahayn dhimashadiisii waxa sababay doorashada iyo in meeshiisa lagu beddelo Rasuul. Aayadda 20b, Yuudas ficilladiisu waxa ay ahaayeen noqoshada waxsii sheegista. Axdiga Cusubi muu diiwaan gelinin doorasho kale oo Rasuulnimada ah markii uu dhintay Yacquub dabadeed (Fal 12:2). Waxa jira qarsoodi badan oo ku sugan noloshii Yuudas. Waxa uu ahaa Rasuulka keliya een kasoo jeedin Galiili. Waxa laga dhigay khasnad haya kooxdii Rasuullada (Yooxanaa 12:6). Waxa lagu eedeeyay xaditaanka lacagta ilaa intii wakhtigii Ciise uu iyaga la joogay. Waxa lagu sheegay dhammaystirka waxsii sheegyada iyo inuu adeegsado Shaydaanku. Ujeeddooyinkiisa weligood lagama hadal, laakiin ka xumaanshaha waxa uu sameeyay waxa ay sababtay inuu is dilo markii uu soo celiyay laaluushkii dabadeed.

Waxa jira waxyaalo badan oo la malaynayo kuna salaysan Yuudas iyo ujeeddooyinkiisii. Waxa lagu sheegay Injiilka Yooxanaa (6:71; 12:4; 13:2,26,39; 18:2,3,5). Sheekada casriga ah “Jesus Christ Superstar” waxa ay ku sheegaysaa inuu yahay nin rumaysad leh, laakiinse wuxuu isku dayay inuu Ciise ku qasbo inuu dhammays tiro doorka Masiixa Yuhuuddu sugayeen, taasina waxa ay ahayd in uu ka takhaluso Roomaanka, oo uu ciqaabo xumaan falayaasha, isla markaasna Yerusaaalem uu ka dhigo caasimadda dunida. Si kastaba ha ahaatee Yooxanaa ujeeddooyinkiisa waxa uu ku tilmaamayaa inuu dantiisa u socday isla markaan rabay inuu dhibo dadka kale.

Dhibaataada ugu muhiimsani waxa weeyi fiqiga la xidhiidha awoodda Ilaah iyo doonista aadanaha. Ma Ilaah ama Ciise ayaa sidaas u galay Yuudas? Sidoo kale Yuudas masuuliyadda ma isaga loo xanbaarinayaa haddii Shaydaanku uu maamulay isaga amaba Ilaah uu hore usii sheegay kuna sababay inuu gacan geliyo Ciise? Kitaabku si toosa ugama hadlayo su’aalahan. Ilaah isaga ayaa taariikhda maamula; waxaanu ogsoonyahay dhacdooyinka mustaqbalka, laakiin aadanuhu waxay masuul ka yihiin doorashada iyo waxyaalaha ay falayaan. Ilaah waa caddaali dadkana ma qasbo.

Waxa jira kitaab cusub oo isku dayaya inuu difaaco Yuudas waana *Judas Betrayer or Friend of Jesus?* Waxaana iska leh William Klassen, Fortress Press, 1996. Anigu ma waafaqsani kitaabkan, laakiinse aad buu u xiiso badan yahay.

▣ **“oo ahaa kii waday kuwii qabtay Ciise.”** Halkan waxan waxa ku sugan xigasho ka ahaatay tafsiiirkayga Matayos 26:47-50 (eeg www.freebiblecommentary.org).

“Waxa jirtay dood badan oo ku saabsan ujeedooyinkii Yuudas. Waxa la sheegay in middani ay tahay waxaan la hubin. Dhunkashadii uu Ciise dhunkaday sida ku sugan aayadda 49 waxa ay noqon karaa (1) inay calaamad u ahayd askarta si ay u gaartaan ninka ay qabanayaan (aayadda 48); ama (2) iyadoo u eelanaysa aragtida cusub ee ah inuu isku dayay inuu Ciise qasbo si uu wax u sameeyo (cf 27:4). Aayadaha kale ee Injiillada kale waxa ay sheegayaan inuu ahaa mid wax dhaca oo ugu horrayntiiba aan rumaysad laahyan (Yooxanaa 12:6).

Luukos 22:52 waxa aan ka garan karnaa sida ay dadkani u qalabaysnaayeen. Waxa jiray askar Roomaan ah oo arrintan ku lug lahaa maxaa yeelay iyaga oo keliya ayaa ahaa kuwa sharci ahaan loo oggolaay inay qaataan seefaha. Sidoo kale ilaalada Macbadku iyana waxa ay ahaayeen kuwo ka qayb ahaa maxaa yeelay hadiyo goor waxay qaadan jireen budad. Matalayaasha Senhadriinkuna iyana meesha way jooheen (aayadah 47,51).”

1:17 Yuudas waxa doortay Ciise, waxa uu maqlay Ciise hadalkiisu, waxa uu arkay Ciise mucjisooyinkiisa, waxa loo diray adeeg, waxa uu joogay qolladii sare isagoo ka qayb qaatay dhacdooyinkan, laakiinse haddana waxa uu gacan geliyay Ciise!

1:18

NASB, NKJV,

NRSV, NJB,

NIV

“intuu madax madax u dhacay ayuu dhexda ka kala dillaacay”

TEV

“halkaasoo uu ku dhintay kuna kala dillaacay”

Waxa suurto gal ah in “madax madax u dhacay” inay ahayd erayo la xidhiidha dhakhtarnimada “si xun wax u gaadheen” (cf. Moulton iyo Milligan, *The Vocabulary of the Greek Testament*, pp. 535-536), kaasi oo laga helayo qaybo ka mida tarjumaadaha Ingiriisida (e.g., Phillips, Moffatt iyo Goodspeed). Wax ku saabsan falaqayn fiican oo la xidhiidha dhimashada Yuudas (Matayos. 27:5 aayadda. Acts 1:18) eeg *Hard Sayings of the Bible*, pp. 511-512.

▣ **“ninkaasu meel ayuu ku iibsaday abaalgudka xaqdarradiis”** aayadha 18-19 waxa ay ku jiraan qaws (cf. NASB, NKJV, NRSV, NJB, NIV). Qoraaga ayaa warbixintan ugu deeqay akhristaha fahankiisa darteed. Matayos 27:6-8 waxa aan ka baranaynaa iyadoo wadaaddadu ay qaybtan dhulka ah ku iibsadeen dhammaystirka waxsii sheegista Axdiga Hore (Matayos 27:9). Waxa ay ahayd Yuudas lacagtiisii midda ay iyagu kasoo qaadeen xaaraanta waxaanay u adeegsadeen in lagu iibiyo beer lagu aaso mayadadka aan cidii garanaynin. Aayadhaa 18-19 waxa ay inoo sheegayaan in ay ahayd goobtii uu ku dhintay Yuudas. Warbixintan ku saabsan dhimashada Yuudasna meel kale laguma sheegin.

1:19 “afkooda” kuwa badan oo ah Yuhuuddii Ciise wakhtigiisu may akhriyi jirin ama ku hadli jirin Cibraaniga, laakiin waxa ay ku hadli jireen luqad la mida oo Semetik ah, waxaanay ahayd Aramaatiga, taasi oo ay barteen wakhtiyadii ay hoos jooheen xukunkii Aasiya. Dadka aqoonta leh ayaa ku hadli karay isla markaana akhriyi karayay Cibraaniga. Ciisena waxa uu u adeegsaday marka uu Sinagooga ka dhex akhriyayo Qorniinka.

Dad badan oo ku sugnaa Falastiin waxa ay ku hadli jireen labo luqadood (Koine ta Giriigga iyo Aramaati) ama waxay ku hadli jireen saddex luqadood (Koine ta Giriigga, Aramaati, iyo Cibraani).

Ciise badanaa waxa uu ku hadlay Aramaati. Erayada ku sugan Injiillada ee la tarjumayna dhammaantood waa Aramaati.



NASB, NRSV “Akeldama, taas oo micneheedu yahay, meeshii dhiigga.”

NKJV “Akeldama, taasoo ah meeshii dhiigga”

TEV “Akeldama, oo loogala jeedo meeshii dhiigga”

NJB “meeshii dhiigga lahayd...Akeldama”

Tani waa tarjumaadda Giriigga ee eray Aramaati ah. Hadiyo goor waxa adag iyadoo qaabka la ilaalinayo in luqada lagu beddelo luqad kale.

Iyadood saamaynayn kala duwanaanshaha qoritaanka Giriigga, Aramaatiga macnihiisu waa “meeshii dhiigga.” Waxa middan macneheedu uu noqon karaa:

1. meesha lagu iibiyay lacag dhiig qabta (cf. Matayos. 27:7a)
2. meeshii dhiigga lagu daadiyay (cf. Fal 1:18)
3. meesha lagu aaso dhiig qabayaasha ajnebiga ah (cf. Matayos. 27:7b)

1:20 kuwani waa labo xigasho oo ka ahaaday Sabuurrada. Ka hore waa Sabuurka 69:25. Asal ahaan waxay ahayd jamac. Waxa ay u shaqaysaa iyadoo ah qaab habaari oo la xidhiidha Yuudas. Xigashada labaadna waxay ka ahaatay Sabuurka 109:8 (LXX). Waxa ay ku deeqaysaa nebiyada waxsii sheegiddooda ku saabsan beddelitaanka booska Yuudas ee lagaga hadlay aayadaha 21-26.

Rumaystayaasha casriga ahi dib umasoo saari karaan nidaamka isu ekaysiinta ah ee fasiraadda maxaa yeelay wakhtigan aan joogno midkeenna maaha mid loo waxyoodo. Ruuxa ayaa qorayaasha kitaabka u hagay darajo aanu u hagin rumaystayaasha danbe. Ruuxu wuu ina ilhaamiyaa laakiin mararka qaar ma waafaqno (eeg Mawduuca Gaarka ah: Waxyiga ee aayadda 16).



NASB, NKJV,

NJB “xafiiskiisa”

NRSV “Wakiilnimadiisa”

TEV “meesha uu ka adeego”

Sabtuujantiga (Toddobaatanlaha) dhexdiisa erayga *episkop* waxa uu xambaarsan yahay wax la xidhiidha shaqo ama adeeg wakiilnimo (cf. Tirintii. 4:16; Sabuurka. 109:8). Waxa ay calaamad u noqotay nidaamka wakiilnimada Roomaan Kaatoliga, laakiin Giriigga dhexdiisa waxa ay ahayd oo keliya hoggaamiyaha magaalo (NIV), sida “duqo” (*presbuteros*) oo ahaa erayga Yuhuuddu u adeegsan jireen hoggaamiyaha (ex. Bilowgii. 50:7; Baxniintii. 3:16,18; Tirintii. 11:16,24,25,39; Sharciga Kunoqoshadiisa. 21:2,3,4,6,19,20 iyo kuwo kale). Haddaba midda gaarka ah ee Yacquub “wakiilnimo” iyo “duq” kaddib dhimashada Rasuullada waxa ay tilmaamysaa wadaadka (cf. Fal 20:17,28; Titos 1:5,7; Filiboy. 1:1).

1:21 “waa inuu” tani waa erayga *dei* (eeg fiirada aayadda 16). Butros waxa uu dareemay in Labo iyo Tobanka Rasuul ay dhinac ka metalayaan labo iyo tobanka qabiil ama ay tahay calaamad kale oo ay waajib tahay in aanay lumin.

1:21-22 Kuwani waa aqoonsiga ama shuruudaha laga rabo Rasuulnimada (Eeg Mawduuca Gaarka ah: Diris [*apostello*] ee 14:4). Fiiro u yeelo iyadoo tusinaysa joogitaanka rumaystayaasha kale ee ka danbeeyay Labo iyo Tobanka kuwaasoo la socday Ciise intii uu adeeggiisa waday. Nidaamkan wakhti danbe qaar ayaa adeegsaday iyaga oo diidaya Rasuulnimada Bawlos.

Luukos waxa uu labadan aayadood ugusoo darayaa si uu u tusiyo muhiimadda ay leedahay markhaatiga Rasuulnimadu, oon ahayn doorashada Matayas, kaasoo aynaan ka maqlin wax badan. Kaniisadda iyo Qorniinka Axdiga Cusubi waxa ay noqon dooneen kuwo ku dhisan nolosha Ciise iyo waxbaristiisa, laakiin waxa dhex u ah markhaatiyaasha goob joogga ahaa, markhaatiga awoodda lahaa, markhaatiga fahanka la doortay, iyo Axdiga Cusub. Tani waa arrinta fahan ahaaneed, mana aha calaamadda “labo iyo tobanka”!

MAWDUUC GAAR AH: TIRADA LABO IYO TOBAN

Labo iyo toban badiyaaba waxa ay ahayd calaamad tiro urur

A. Ka baxsan kitaabka

1. Labo iyo tobanka Burji
2. Labo iyo tobanka bilood ee sannadka

B. Axdigii Hore, (BDB 1040 lagu daray 797)

1. Wiilashii Yacquub (qabiillada Yuhuudda)
2. Ka tarjumaysa
 - a. Labo iyo tobankii tiir ee taambuugga sida ku jirta Baxniintii 24:4
 - b. Labo iyo tobankii dahab ee ku yaallay saxuuntii wadaadka sare (taasoo u taagan qabiilooyinka) sida ku qoran Baxniintii 28:21
 - c. Labo iyo tobankii kibsood ee meesha qudduuska ah ee taambuugga Laawiyiintii 24:5
 - d. Labo iyo tobankii basaas ee loo diray Kancan Tirintii 13 (mid kastaana uu ka socday qabiil)
 - e. Labo iyo tobankii ulood (heerarka qabiilka) ee mucaaradaddii Qorax Tirintii 17:2
 - f. Labo iyo tobankii dhagax ee Yashuuca sida ku qoran Yashuuca 4:3,9,20
 - g. Labo iyo tobankii maammul degmo ee maammulkii Sulaymaan I Boqorrada 4:7
 - h. Labo iyo tobankii dhagax ee taambuuggii Eliishaah u dhisay YHWH sida ku jirta I Boqorrada 18:31

C. Axdiga Cusub

1. Labo iyo tobankii rasuul ee la doortay
2. Labo iyo tobankii salladood ee kibista ahaa (ee mid kasta loogu talo galay hal rasuul) sida ku jirta Matayos 14:20
3. Labo iyo tobanka kursi ee sida Axdiga Cusub sheegay ay xertu fadhiisanayaan (oo ku saabsan labo iyo tobanka qa biil ee reer banii Israa'iil) matayos 19:28
4. Labo iyo tobankii kooxood ee malaa'igta ahaa ee Ciise badbaadinayey sida ku jirta Matayos 26:53
5. Calaammadda muujinta
 - a. Afar iyo labaatankii oday ee ku kala fadhiyey afar iyo labaatanka kursi sida ku jirta 4:4
 - b. 144,000 (12x12,000) sida ku qoran aayadaha 7:4; 14:1,3
 - c. Labo iyo tobankii xiddigood ee ku taxnaa taajkii gabadha sida ku qoran 12:1
 - d. Labo iyo tobankii albaab, labo iyo tobankii malag waxa ay ka tarjumayaan labo iyo tobankii qabiilo sida ku qoran 12:1
 - e. Labo iyo tobanka dhagax ee aasaaska u ah Yerusaaalem-ta cusub ee ay ku kala dul qoran yihiin magacyada labo iyo tobanka rasuul 21:14
 - f. Labo iyo tobankii kun ee istaadyon sida ku jirta 21:16 (cabbirka magaalada cusub, ee Yerusaaalem)
 - g. Gidaarka dhererkiisu waa 144 kubits sida ku jirta 21:7
 - h. Labo iyo tobanka albaab ee luulka sida ku qoran 21:21
 - i. Dhirta ku taalla Yerusaaalem-ta cusub oo leh labo iyo toban nooc oo midho ah (nooc kasta hal bil)sida ku qoran 22:2

1:23 “laba iska soo saareen” waxa jira kala duwanaansho u dhexeeya qoraal gacmeeyada Giriigga oo tusinaya arrinta fiqi ahaaneed ee la xidhiidha ereyadan:

1. *estēsan* (“waxay iska soo saareen”) sida ku sugan MSS α , A, B, C, D¹, E
2. *estesēn* (“wuxuu soo saaray”) sida ku sugan MS D* (qarnigii shanaad), Lectionary 156 (qarniga tobnaad), labo ah qoraalgacmeedyadii Gaboobay ee Laatiinka (qarniyadii shanaad iyo saddex iyo tobnaad), iyo Augustine (C.D. 354-430). (UBS⁴ waxa uu kusoo aroorinaya “A”).

Haddii ay tahay midda koobaad, waxa ay tusaale u tahay gebi ahaanba kooxda xerta oo u codaynaya cidda bedelaysa Yuudas (qaabka dadka kaniisadda (cf. 15:22), laakiin haddii ay tahay midda labaad, waxa ay middani caddayn u tahay awoodda Butros (15:7-11, 14). Sida qoraal gacmeeyada Giriigga caddaynayaan, midda koobaad ayaa hubaal ah

▣ **“Yuusuf...Matiyas”** ninkan waxba kama garanayno marka la eego Axdiga Cusub. Waa in aan xasuusnaano in Injiillada iyo Falimaha Rasuulladu aanay ahayn taariikh reer galbeed, laakiinse ay yihiin qoraallo fiqi ahaaneed oo loo doortay in ay wax inaga baraan Ciise iyo inay tusiyaan sida farriintiisu u saamaysay dunida.

1:24

NASB “adigoo garanaya qalbiga dadka oo dhan”
NKJV “adigoo garanaya qalbiyada dhammaantood”
NRSV “waxaad ogtay qof kasta qalbigiisa”
TEV “waxaad ogtahay fikirrada qof kasta”
NJB “waxaad akhriyi kartaa qofkasta qalbigiisa”

Kuwani waa erayo lakab ah, “qalbiyo” iyo “garasho” (15:8). Middani waxa ay ka tarjumaysaa xaqiiqo ku sugan Axdiga Hore (cf. I Samuul 2:7; 16:7; I Boqorradii. 8:39; I Taariikhdi. 28:9; II Taariikhdi. 6:30; Sabuurka. 7:9; 44:21; Maahmaahyadi. 15:11; 21:2; Yeremyaah. 11:20; 17:9-10; 20:12; Luukos 16:15; Fal 1:24; 15:8; Rooma. 8:27). Ilaah si buuxda ayuu inoo garanayaa waanu ina jecelyahay (Rooma 8:27).

Xertu waxa ay qirsanaayeen in YHWH uu ogsoonyahay ujeedooyinkooda iyo ujeedooyinka labada sharraxan. Waxa ay doorashadan la rabeen doonista Ilaah (fal tegay). Ciise waxa uu doortay Labo iyo Tobanka, laakiinse hadda waxa uu la jiraa Aabbaha.

MAWDUUC GAAR AH: QALBIGA

Erayga *kardia* oo ah qalbiga ayaa waxa lagu adeegsaday Axdiga Cusub, xagga luqadda Cibraanigana waxa la yidhaahdaa *leb*. Waxa siyaabo kala duwan loogu dhex adeegsaday (Bauer, Arndt, Gingrich iyo Danker, *A Greek English Lexicon*, pp. 403-404).

1. Xarunta nolosha qofka (Falimaha Rasuullada 14:17; 2 Korintos 3:2-3; Yacquub 5:5)
2. Xarunta nolosha ruuxiga ah
 - a. Ilaah wuxuu ogyahay qalbiga (Luukos 16:15; Rooma 8:27; 1 Korintos 14:25; 1 Tesoloniika 2:4; Muujintii 2:23).
 - b. Waxa loo adeegsaday nolosha ruuxiga ah ee aadanaha (Matayos 15:18-19; 18:35; Rooma 6:17; 1 Timoteyos 1:5; 2 Timoteyos 2:22; 1 Butros 1:22).
3. Xarunta fikirka nolosha (Matayos 13:15; 24:48; Falimaha Rasuullada 7:23; 16:14; 28:27; Rooma 1:21; 10:6; 16:18; 2 Korintos 4:6; Efesos 1:18; 4:18; Yacquub 1:26; 2 Butros 1:19; Muujintii 18:7; qalbigu wuxuu la xidhiidhaa maskaxda 2 Korintos 3:14-15 iyo Filiboy 4:7).
4. Xarunta doonitaanka (Falimaha Rasuullada 5:4; 11:23; 1 Korintos 4:5; 7:37; 2 Korintos 9:7)
5. Xarunta caadifadaha (Matayos 5:28; Falimaha Rasuullada 2:26,37; 7:54; 21:13; Rooma 1:24; 2 Korintos 2:4; 7:3; Efesos 6:22; Filiboy 1:7).
6. Meel u gaara shaqooyinka Ruuxa (Rooma 5:5; 2 Korintos 1:22; Galatiya 4:6(Masiixu qalbiyadeennu ku jiraa Efesos 3:17).
7. Waa xarunta ka tarjumaysa gebi ahaanba qofka (Matayos 22:37, oo kasoo qaadanaya Shariciga ku noqoshadiisa 6:5). Fikirka iyo iyo camalku waxa ay ka tarjumayaa waxa qofka ku jira qalbigiisa. Meelo ka mida Axdiga Hore oo lagu isticmaalay eraygan
 - a. Bilowgii 6:6; 8:21 “Rabbigu qalbiguu ka qoomamooday,” sidoo kale u fiirso Hoosheeca 11:8-9.
 - b. Sharciga Kunoqoshadiisa 4:29; 6:5, “qalbigaaga iyo naftaada oo dhan”
 - c. Sharciga Kunoqoshadiisa 10:16 “qalbiga aan gudnayn” iyo Rooma 2:29
 - d. Yexesqeel 18:31-32 “qalbi cusub”
 - e. Yexesqeel 36:26, “qalbi cusub” oo uu kasoo horjeedo “qalbi engegani”

1:25 “meeshii” waxa ay middani ka dhigantahay waa “xoojin.” Shaydaanka ayaa isaga u adeegsaday ujeedooyinkiisa (cf. Luukos 22:3; Yooxanaa 13:2; 27), laakiinse Yuudas waxa uu masuul ka yahay doorashooyinkiisa iyo waxyaalaha uu ku tallaabsaday (Galatiya 6:7).

1:26 “Markaasay u saami riteen” middani waxa ay asal ahaan la xidhiidhaa Axdiga Hore iyadoo Wadaadka Sare adeegsan jiray sida ku sugan Laawiyyintii 16:8, ama dadka gaarka ah ee nidaamkan oo kale adeegsan jiray (cf. Maahmaayadii. 16:33; 18:18). Askartii Roomaanka ayaa u saami ridatay dharkii Ciise (Luukos 23:34). Si kastaba ha ahaatee, tani waa markii ugu dambaysay ee nidaamka lagu ogaanayo doonista Ilaah lagu dhex sheegay Axdiga Cusub. Haddii la isku dayo in la raadiyo qoraallo caddayn ah, nidaamkani waxa uu caadi u noqonayaa go’aan qaadashada ruuxiga ah, kaasoo aad aan nasiib la’aan u noqon karin (furitaanka Kitaabka oo qof farta uu saaro si loo garto doonista Ilaah). Rumaystayaashu waa in ay ku noolaadaan rumaysad, laakiinse maaha inay ku noolaadaan waxyaabo la taaban karo oo lagu garanayo doonista Ilaah (cf. Xaakinnada. 6:17,36-40).

▣ **“Matiyas”** Eusebius ayaa odhanaya waxa uu ka qayb qaatay hawlgalkii toddobaatanka (Luukos 10). Wakhti danbana dhaqammadu waxay sheegayaan inuu ku shahiiday Ethiopia.

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu Ciise xerta uula joogay 40 maalmood?
2. Waa maxay “ku baabtiiska Ruuxu?”
3. Maxay aayadda 7 aad muhiim uugu tahay?
4. Maxay sare u qaadistu muhiim u tahay?
5. Muxuu Butros u dareemay baahida loo qabo in la helo beddelkii Yuudas?
6. Sidee Bawlos uu ku noqon karaa Rasuul isaga oon buuxinin shuruudaha rasuulnimada? (1:21-22).

FALIMAHA RASUULLADA 2

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Imaatinka Ruuxa Quduuska	Imashada Ruuxa Quduuska	Maalintaa Bentakostiga	Imaatinka Ruuxa Quduuska	Bentakostiga
2:1-4	2:1-4	2:1-4	2:1-4	2:1-4
	Dadkii badnaa oo ka jawaabay		2:5-13	2:5-13
2:5-13	2:5-13	2:5-13		
Wacdintii Butros ee Bentakostiga	Wacdintii Butros	Wacdintii Butros	Wacdintii Burtos	‘Butros oo dadkii badnaa la hadlay
2:14-21	2:14-39	2:14-21	2:14-21	2:14-21
2:22-28		2:22-28	2:22-28	2:22-28
2:29-36		2:29-36	2:29-35	2:29-35
			2:36	2:36
		Ku baaqitaanka towabad keenka		Dadkii ugu horreeyay noqda Masiixiyiin 2:37-41
2:37-42		2:37-42	2:37	
			2:38-39	Masiixiyiintii ugu horraysay 2:42
	Kaniisadda oo koraysa			
	2:40-47		2:40-42	
Noloshii rumaystayaasha			Noloshii rumaystayaasha	
2:43-47		2:43-47	2:43-47	2:43
				2:44-45
				2:46-47

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDEEDA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Tani wacdintii ugu horraysay ee Da'da Cusub. Fiiro u yeelo xigashooyinka Axdiga Hore iyo tusaalayaasha ku sugan cutubka 2. Butros waxa uu wacdinayaa Yuhuudda dhammaan ku noolayd dunidii Bariga dhexe. Qorniinnada uu dooranayaa waxa ay ka tarjumayaan waxbaristii Ciise ee labadii kusii socday jidka Emmaus (cf. Luukos 24:21-32) iyo kaddib markii uu sara kacay booqashooyinkii uu ku booqday xerta (Luukos 24:45).
1. aayadaha. 16-21 – Yoo'eel 2:28-32
 2. aayadaha. 25-28 – Sabuurka 16:8-11
 3. aayadda. 30 – tusaalaha II Samuu'eel. 7:11-16 iyo Sabuurka. 89:34 or 132:11
 4. aayadaha . 34-35 – Sabuurka 110:1
- B. Dhammaystirka Yoo'eel waxsii sheegista ku sugani waa muujinta tusinaysa xukunka Ilaah ee uu Israa'iil Ruuxiisa kaga qaaday kaddib Malaakii (ama qoraaga Taariikhdii) way dhammaatay! Ruuxii waa uu soo laabtay isaga oo leh awood iyo ujeeddo wayn!
- C. Wareerkii luqadaha ee ka ahaaday Taalladii Baabel (Bilowgii 11) hadda waa waa lasoo celiyay. Da'da casriga ahi hadda ayay bilaabantay.
- D. Hadda “carrabada” ku sugan Falimaha Rasuulladu way ka duwanyihiin carrabada ku sugan Korintos. Looma baahna fasiraad. Farriintuna waxa ay khaas u tahay wacdin. Carrabada ku sugan Falimaha Rasuullada ee Yuhuudda rumaysadka lihi waa aqoonsiga in Ilaah uu aqbalay koox cusub oo dadka ah isla markaana uu kusoo daray Boqortooyadiisa (Samaaritaanka, Roomaanka, iwm).
- Carrabada ku sugan Korintos waxa ay ku habboon yihiin dhaqanka Delphi Oracle. Waxa ay ka hadlayaan Ilaah mana aha aadanaha (1 Korintos 14:2). Waxa ay tusinayaan cidda hadlaysay (1 Korintos 14:4). Fadlan ufiirsashadan ha ugu qaadan macne kaste oo la mida Korintos (1 Korintos 14:5,18). Waxa aan rumaysanahay ilaa hadda in ay tahay hadiyad ruuxi ah. Si kastaba ha ahaatee, su'aalaha I Korintos. 12:28-29 daraaddood, kuwaas oo filaya jawaaba ah “maya” uma ay ahaanin rumayste kasta! Ka eeg fiirada mawduuca 1 Korintos 12 iyo 14 www.freebiblecommentary.org.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 2: 1-4

¹Oo kolkii maalintii Bentekost la gaadhay, meel bay kulligood wada joogeen. ²Oo waxaa filan la'aan samada ka yimid sanqadh sida dabayl xoog leh oo aad u dhacaysa, oo waxay buuxisay gurigii ay fadhiyeen oo dhan. ³Markaasaa carrabbo u kala qaybsamaya sida dab oo kale iyaga u muuqday oo ku dul fadhiistay midkood kasta. ⁴Kolkaasaa waxaa kulligood ka wada buuxsamay Ruuxa Qoduska ah, oo waxay bilaabeen inay afaf kale ku hadlaan sidii Ruxuu iyaga u siiyey hadalka.

2:1 “Benteksot” ciiddan sannadlaha ah ee Yuhuudda waxa sidoo kale lagu magacaabi jiray “Ciidda Usbuucyada” (cf. Baxniintii. 34:22; Sharciga Kunoqoshadiisa. 16:10). Erayga “bentakost” waxa macnihiisu yahay “kontonaad.” Ciiddannina waxay ahayd konton cisho (toddoba usbuuc) Kormarista dabadeed (waxaana laga tirin jiray maalintaa labaad ee Ciidda Kibista aan Khamiirka lahayn). Waxa ciiddani ay lahayd saddex ujeedo:

1. xusitaanka Sharcigii Muuse la siiyay (cf. *Jubliees* 1:1)
2. ilaah oo looga mahad naqayo midho goosashada
3. bixinta midhaha ugu horreeya (i.e., calaamadda YHWH oo leh midhaha oo dhan) ee midhaha soo baxa. Asalkeedu wuxuu la xidhiidha Axdiga Hore sida ku sugan Baxniintii. 23:16-17; 34:22; Laawiyiintii. 23:15-21; Tirintii. 28:26-31 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa. 16:9-12.



NASB, NRSV “la gaadhay”
NKJV “si buuxda loo gaadhay”
TEV “timid”
NJB “timid oo la gaadhay”

Macno ahaan waxa weeyi “way buuxsantay.” Waa fal wakhtigiisu joogo. Tani waxa ay ahayd ballan qaad ilaahi ah iyo dhammaystirka ujeedo ilaahi ah. Waxa lagu adeegsaday oo keliya qoraallada Luukos (cf. Luukos 8:23; 9:51; halkan; iyo tusaale la mida oo ku sugan Luukos 2:6).

Taariikhda aadanaha waxa dejiyay YHWH.

M. R. Vincent, ayaa kitaabkiisa *Word Studies*, vol. 1, p. 224, waxa uu inagu xasuusinayaa in Yuhuuddu ay maalintan u arkeen sidii wax la buuxiyay. Wakhtigii Bentakostigu si buuxda ayuu u yimid! Sidoo kale waxa ay ahayd wakhtiga Ilaah ee gaarka ah oo ah Da’da ama casriga Ruuxa, iyo bilowga kaniisadda.



“meel bay kulligood wada joogeen” erayadani waxa ay tusinayaan midnimada maanka iyo goobta (1:14). Lama hubo meesha ama goobta ay ku timid. Waxa ay ahayd “qolladdii sare” (cf. Fal 1:13; “guri,” aayadda. 2), laakiinse meelaha qaar ayaa Macbadku uu kaga lug lahaa khibraddan (cf. Luukos 24:53; inta ay kooxda leeyay aayadda. 47).

2:2 “samada ka yimid sanqadh sida dabayl xoog leh oo aad u dhacaysa” qaybtan oo dhan waxa la xoojinayaa codka, lamana xoojinayo dabaysha ama dabku. Waxa ay middani la mid tahay Bilowgii 3:8. Axdiga Hore dhexdiisa erayga *ruah* (BDB 924) waxa loo adeegsaday neef, dabayl. Iyo Ruux (cf. Yexesqeel. 37:9-14); Axdiga Cusub dhexdiisa *pneuma* waxa loo adeegsaday dabayl iyo Ruuxa Quduuska ah (Yooxanaa 3:5-8). Erayga dabayl ee ku sugan aayaddani waa *pnoē*. Waxaana lagu adeegsaday halkan iyo 17:25. Erayga *pneuma* waxa loo adeegsaday Ruuxa sida ku sugan aayadda 4.

MAWDUUC GAAR AH: RUUXA (PNEUMA) KU JIRA AXDIGA CUSUB

Ereyga Giriigga ee “ruuxa” waxaa Axdiga cusub dhexdiisa loo adeegsadaa dhowr hab. Halkan waxaa ah bayaanno wakiil ah iyo tusaaleyaal.

A. Uu Ilaaha Qaaddirka ahu leeyahay

1. Ee ah Aabbaha (cf. Yooxanaa 4:24)
2. Ee ah Wiilka (cf. Rooma 8:9-10; II Korintos 3:17; Galatiya 4:6; I Butros 1:11)
3. Ee ah Ruuxa Qudduuska ah (cf. Markos 1:11; Matayos 3:16; 10:20; Yooxanaa 3:5,6,8; 7:39; 14:17; Falimaha Rasuullada 2:4; 5:9; 8:29,35; Rooma 1:4; 8:11,16; I Korintos 2:4,10,11,13,14; 12:7)

B. Xoogga nolosha aadanaha

1. Ee Ciise (cf. Markos 8:12; Yooxanaa 11:13,38; 13:21)
2. Ee aadanaha (cf. Matayos 22:43; Falimaha Rasuullada 7:59; 17:16; 20:22; Rooma 1:9; 8:16; I Korintos 2:11; 5:2-5; 7:34; 15:45; 16:18; II Korintos 2:13; 7:13; Filiboy 4:23; Kolosay 2:5)

C. Boqortooyada ruux ahaaneed

1. Ahaanshooyin ruuxi ah
 - a. Wanaag (i.e., malaa'igaha, cf. Falimaha Rasuullada 23:8-9; Cibraaniyada 1:14)
 - b. Sharka (i.e., jinka, cf. Matayos 8:16; 10:1; 12:43,45; Falimaha Rasuullada 5:16; 8:7; 16:16; 19:12-21; Efesos 6:12)
 - c. Cirfiidka (cf. Luukos 24:37)
2. Ciqaabta ruuxiga ah (cf. Matayos 5:3; 26:41; Yooxanaa 3:6; 4:23; Falimaha Rasuullada 18:25; 19:21; Rooma 2:29; 7:6; 8:4,10; 12:11; I Korintos 14:37)
3. Wayaabah ruuxiga ah (cf. Yooxanaa 6:63; Rooma 2:29; 8:2,5,9,15; 15:27; I Korintos 9:11; 14:12)
4. Hadiyadaha ruuxiga ah (cf. I Korintos 12:1; 14:1)
5. Waxyiga Ruuxa (cf. Matayos 22:43; Luukos 2:27; Efesos 1:17)
6. Jidha ruuxiga ah (cf. I Korintos 15:44-45)

D. Dabeecadda

1. Fikira adduunka (cf. Rooma 8:15; 11:8; I Korintos 2:12)
2. Hannaanka fakarka aadanaha (cf. Falimaha Rasuullada 6:10; Rooma 8:6; I Korintos 4:2)

E. Boqortooyada jidh ahaaneed

1. Dabaysha (cf. Matayos 7:25,27; Yooxanaa 3:8; Falimaha Rasuullada 2:2)
2. Neefta ama neefsashada (cf. Falimaha Rasuullada 17:25; II Tesaloniika 2:8)

Waa wax iska cad in ereygani uu u baahan yahay in lagu tarjumo iftiinka macnaha guud ee uu xambaarsan yahay. Waxaa jira hoosas kala duwan oo macna ah oo loo tixraaci karo (1) adduunkan muuqda; (2) adduunka aan la arag; (3) si la mid ah sida dadka adduunkan muuqda ama kuwa boqortooyada ruuxiga ah.

Ruuxa Qudduuska ahu waxa uu ku jiraa saddexda shaqsi ee Ilaah kaasoo si aad ah u maammula oo uga dhex shaqeeya masraxa taariikhda. Faca cusub ee Ruuxa ayaa yimid. Taas dhammaan way fiican tahay, oo waa qudduus, iyo run la xidhiidha Isaga. La joogistiisa, hadiyadihiisa, iyo adeeggiisuba waxa ay lagama maarmaan u yihiin qoto dheeraanta Injiilka iyo guusha Boqortooyada Ilaah (cf. Yooxanaa 14 iyo 16). Isagu wax dareen ah uma uusan bixin naftiisa, laakiin Masiixa (cf. Yooxanaa 16:13-14). Jeel ayuu u gala, wuu u qiraa dadka, wuu ku dhiirri geliyaa, oo wuu qaan gaadhsiiyaa rumaystayaal oo dhan (cf. Yooxanaa 16:8-11).

2:3 “Markaasaa carrabbo u kala qaybsamaya sida dab oo kale iyaga u muuqday” Qoraalku waxa ay u muuqataa in uu sheegayo dhicitaanka cod iyo iftiin. Iftiinka sida dabka oo kale ah ugu horrayntii way isku jireen, laakiin waa ay kala jabeen oo ku dul urureen rumayste kasta. Mid kasta oo ku jiray Qolladda Sare – Rasuulladii, Ciise xubinihii qoyskii, iyo xertii – waxa ay heleen muujinta ay wada heleen. Kaniisaddu waxay ahayd mid qudha!

Ciidda Bentakostigu waxa ay ka timid diinta Yuhuudda iyada oo loo dabbaal degi jiray Sharciga Muuse ee lagu siiyay Buur Siinay dusheeda (marka dhaqanku sida uu kusoo horumaray aan la hubin, waxa ay ku iman kartaa qarnigii labaad C.D., laakiin waxa dhici karta inay ka horraysay). Haddaba, dabaysha culus iyo dabku waxa ay noqon karaan xasuusinta layaabka YHWH oo kasoo farxamaya Xooreeb (Baxniintii 19:16).

Axdiga Hore dhexdiisa dabku waxa uu calaamad u yahay (1) joogitaanka ilaahnimada; (2) xukunka (cf. Ishacyaah. 66:15-18); ama (3) quduusinta (cf. Baxniintii. 3:2; Sharciga Kunoqoshadiisa. 5:4 iyo Matayost. 3:11). Luukos waxa uu adeegsanayaa inuu si gaar ah u sheego muujinta Ruuxa. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: DABKA

Dabku waxa uu leeyahay waxyaalo isugu jira xumaan iyo wanaag Kitaabka dhexdiisa

A. Wanaaga

1. Waxbuu diiriyaa (Ishacyaah 44:15; Yooxanaa 18:18)
2. Waxbuu iftiimiyaa (Ishacyaah 50:11; Matayos 25:1-13)
3. Waxbuu kariyaa (Baxniintii 12:8; Ishacyaah 44:15-16; Yooxanaa 21:9)
4. Waxbuu nadiifiyaa (Tirintii 31:22-23; Maahmaahyadii 17:3; Ishacyaah 1:25; 6:6-8; Yeremyaah

6:29; Malaakii 3:2-3)

5. Quduusnaan (Bilowgii 15:17; Baxniintii 3:2; 19:18; Yexesqeel 1:27; Cibraaniyada 12:29)
6. Hoggaaminta Ilaah (Baxniintii 13:21; Tirintii 14:14; 1 Boqorradii 18:24)
7. Awoodda Ilaah (Falimaha Rasuullada 2:3)
8. Ilaalin (Sekeryaah 2:5)

B. Xumaanta

1. Waxbuu gubaa (Yashuuca 6:24; 8:8; 11:11; Matayos 22:7)
2. Waxbuu burburiyaa (Bilowgii 19:24; Laawiyiintii 10:12)
3. Cadho (Tirintii 21:28; Ishacyaah 10:16; Sekeryaah 12:6)
4. Ciqaab (Bilowgii 38:24; Laawiyiintii 20:14; 21:9; Yashuuca 7:15)
5. Calaamad been ah (Muujintii 13:13)

C. Waxa lagu tilmaamaa cadhada Ilaah iyo naarta

1. Cadhadiisu way gubataa (Hoosheeca 8:5; Sefanyaah 3:8)
2. Daadashada cadhadiisa (Naaxuum 1:6)
3. Dabka abidka ah (Yeremyaah 15:14; 17:4)
4. Ciqaabka aakhiro (Matayos 3:10; 13:40; Yooxanaa 15:6; 2 Tesaloniika 1:7; 2 Butros 3:7-10; Muujintii 8:7; 16:8)

D. Sida erayo badan oo ka mida Kitaabka (khamiirka, libaaxa) ayaa dabku waxa uu noqon karaa barako ama habaar kolba sida loogala jeedo.

▣ **“midkood kasta”** May jirin kala soocitaan ama eexasho loo kala sameeyay Rasuullada ama xerta; rag iyo dumar (cf. Yoo’eel 2:28-32; Fal 2:16-21).

2:4 “waxaa kulligood ka wada buuxsamay Ruuxa Qoduuska ah” dhacdadan waxa lagu sheegay Luukos 24:49 waxaana lagu magacaabay “ballan qaadka Aabbahay.” “buuxsamay” waa ay soo noqnoqonaysaa (cf. 2:4; 4:8,31; 6:3,5; 7:55; 9:17; 11:24; 13:9). Waxa ay tusinaysaa la midnimada Masiixa ee maalin kasta ah (cf. Efesos. 5:18 oo la barbar dhigay Kolosay. 3:16). Middani waxa ay ka duwantahay baabtiisamka Ruuxa, kaasi oo tusinaya khibradda ugu horraysa ee Masiixiga ama iskaashiga uu la samaynayo Masiixa (cf. I Korintos. 12:13; Efesos. 4:4-5). Ka buuxsamitaanku waa awoodaynta ruuxi ahaaneed ee adeegga waxtarka leh (cf. Efesos. 5:18-20), halkanna waa wacdinta! Eeg fiirada 3:10.

Siyaabo badan ayaa qaybo Wacdinta ahi waxa ay la fal galeen waxa ay u arkaan inuu yahay khibrad ruuxi ahaaneed halkaasoo ay kala mid dhigeen sida Axdiga Cusubi u xoojinayo Ruuxa Quduuska ah. labo kitaab oo iga caawiyay ku shaqaynta arrintan ayaa waxa qoray Gordon Fee.

1. *Gospel and Spirit*

2. *Paul, the Spirit, and the People of God*

Eeg fiirada 5:17.

▣

NASB, NKJV

“waxay bilaabeen inay afaf kale ku hadlaan”

NRSV

“waxay bilaabeen inay ku hadlaan luqado kale”

TEV

“ku hadleen luqado kale”

NJB

“waxay bilaabeen inay ku hadlaan luqada kala gedisan”

Macno ahaan waxa weeyi “carrabyo kale” (*heterais glōssais*). Tarjumaadda “luqado kala duwan” waxa ay tusinaysaa fahanka ereyadan oo ku salaysan macnaha aayadda 6 iyo 11. Tusaalaha kale ee suurto galka ahi waa “isbedel lagu farxo” iyadoo ku salaysan 1 Korintos 12-14 waxa kaloo suurto gal ah Fal 2:13. Waxa aan la hubin sida luqada kala gedisan loogu hadlay, laakiinse way badnaayeen. Haddii aad isku daydo in aad waddamada dunida oo dhan kusoo darto aayadaha 9-11 waxa ay noqon kartay in ka badan labaat. Kuwo badan oo ka mid ah 120 rumaystena waxa ay ku hadleen luqado isku mid ah.

Ilaah waxa uu sameeyay wax cajiib leh oo awoodna leh si uu u saameeyo kooxdan yar ee isugu jirta ragga iyo haweenka iyagoo dhex jooga qollad sare si ay u noqdaan kuwa qaada masuuliyadda faafinta injiilka (rag iyo dumarba). Waxay doontaba ha noqoto calaamaddan ugu horraysay ee imaatina Ruuxa Quduusku ee, Ilaah sidoo kale waxa uu u adeegsaday ansixinta inay isaga aqbalaan kooxaha kale (tusaale ahaan, Samaaritaanka, saraakiishii askarta Roomaanka, iyo kuwa aan Yuhuudda ahaynba).

“Carrabada” ku sugan Falimaha Rasuulladu waxa ay hadiyo goor calaamad u ahaayeen rumaystayaasha uu injiilku uugu yimid cirqi kale iyo goobo juquraafi. Waxa jira farqi u dhexeeya carrabada ku sugan Falimaha Rasuullada iyo Bawlos adeeggiisii danbe ee uu ka hayay Korintos (1 Korintos 12-14).

Fiqi ahaan waxa suurto gal ah in Bentakostigu uu yahay mid kasoo horjeeda taalladii Baabel (Bilowgii 1-11). Iyagoo ah aadanaha faanka iyo leexashada badani ay sheegeen madaxbannaanidooda (diidmada inay dhulka cammiraan oo buuxiyaan), ayaa Ilaah waxa uu dunida soo dhex geliyay luqado kala gedisan. Imika wakhtiga casriga ah ee Ruuxa, kala soocidda u diidaysa aadanaha inay midoobaan (hal caalam oo midaysan) ayaa rumaystayaasha loo oggolaaday. Is weheshiga Masiixinimada ee aadanaha oo dhan (da’, cayn, heer, juqraafi, luqad) waa dib usoo celinta Bilowgii 3.

▣ **“sidii Ruxuu iyaga u siiyey hadalka”** falkani waa midaan ebyan ahayn oo wax tusmaynaya, taasi oo macneheedu yahay inuu Ruuxu bilaabay inuu iyaga wax siiyo. Erayga “hadalka” (*apophthegomai*) waa fal wakhti xaadirka jooga. Eraygan Luukos oo keliya ayaa ku dhex adeegsaday Falimaha Rasuullada (cf. 2:4,14; 26:25). Sebtoojantigana waxa loogu dhex adeegsaday hadalka nebiyada (i.e., hadalka Ruuxu waxyooday, cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 32:2; I Korintos. 25:1; Yexesqeel. 13:9,19; Miikaah. 5:11; Sekeryaah. 10:2).

Waxa aan fasiraaddan u door bidayaa macnaha Giriigga Qadiimiga ah “cod la dallacay,” “hadal xooggan” ama “hadal la korraysiiyay.” Luukos waxa uu aqoon u lahaa Sebtoojantiga waxaana saameeyay ereyadiisa. Sebtoojantigu waxa uu ahaa Kitaabka dunidii dhexe waxaanu noqday Kitaabka kaniisadda.

NASB (UPDATED) TEXT: 2:5-13

⁵Markaas waxaa Yerusaaalem joogay Yuhuud oo ahaayeen niman cibaado leh oo ka yimid quruun kasta oo samada hoosteeda joogta. ⁶Oo markii sanqadhaas la maqlay, dadkii badnaa ayaa isu yimid, na yaabeen, maxaa yeelay, nin kastaa wuxuu maqlay iyagoo afkiisa ku hadlaya. ⁷Oo dhammaantood wada nexeen oo yaabeen, oo waxay yidhaahdeen, Bal eeg, kuwan hadlaya oo dhammu miyaanay reer Galili ahayn? : ⁸Sidee baa midkean waluba u maqlaa iyagoo ku hadlaya afkeenna aynu ku dhalannay? ⁹Innagoo ah reer Bartiya iyo Mediya iyo Ceelaam, iyo kuwa deggan Mesobotamiya, iyo Yahuudiya iyo Kabbadokiya, iyo Bontos iyo Aasiya, ¹⁰iyo Farugiya iyo Bamfuliya, iyo Masar iyo meelaha Liibiya oo Kuranaya ku wareegsan, iyo ajnabiyo Rooma ka yimid oo ah Yuhuud iyo kuwa raacsan labadaba, ¹¹iyo reer Kereetee iyo Carabta, waxaynu maqlaynaa iyagoo ku hadlaya afafkeenna oo ka hadlaya Ilaah waxyaalihiiisa waaweyn. ¹²Markaasay wada yaabeen oo shakiyeen, oo waxay isku yidhaahdeen, Tani micneheedu waa maxay? ¹³Qaar kalena waa ku qosleen oo waxay yidhaahdeen, Kuwan waxaa ka buuxa khamri cusub.

2:5 “cibaado” eraygan macnihiisu waxa weeyi “iyadoo wax loo qaato si fiican” (cf. LXX Laawiyiintii. 15:31; Miikaah7:2). Marka loo eego xaaladda Yuhuuddii qarnigii koobaad, waxa ay u noqonaysaa Ilaah iyo dhaqammada Duqaytidada (Dhaqanka, kaasi oo noqday Talmuudka). Waxaanay ahaayeen dad diin leh (cf. 8:2; 22:12; Luukos 2:25). Middani waxa ay la macno tahay “eed la’aan” waxaana loo adeegsaday Nuux iyo Ayuub.

▣ **“oo ka yimid quruun kasta oo samada hoosteeda joogta.”** Dhammaanba ragga Yuhuudda ahi waxay ahayd in ay xaadiraan saddexda maalmood ee ugu muhiimsan maalmaha ciidda (cf. Laawiyiintii 23) Macbadka (Sharciga Kunoqoshadiisa 16:16). Waxa jiray halkaas:

1. dad xajaya oo ka iman jiray Bariga Dhexe isla markaasna Yerusaaalem u iman jiray Kormaridda iyagoo joogi jiray ilaa Bentakostiga.
 2. (cf. use of the word in 4:16; 7:24; 9:22,32) dad si ku meel gaadha u joogaya oo ka yimid meelo ka baxsan Yerusaaalem (cf. eraygoo lagu dhex adeegsaday 4:16; 7:24; 9:22,32)
- Middani waxay leedahay fiqi maldahan (cf. Matayos. 28:19-20; Luukos 24:47; Acts 1:8).

2:6 “Oo markii sanqadhaas la maqlay” middani waxa loogala jeedi karaa (1) codka dabayshii sanqadhaysay (aayadda 2) ama (2) rumaystayaasha oo ku hadlayay luuqado kale (aayadda 4).



NASB, NRSV,
NJB “yaabeen”
NKJV “wareereen”
TEV “farxeen”

Eraygan mid la mid ah ayaa lagu adeegsaday Sebtuujiangiga Bilowgii 11:7,9, taasi oo la xidhiidha jaha wareerkii la xidhiidhay luqadaha ee Taalladii Baabel. Waxa aan u malaynayaa Betakostigu waxa uu calaamad u yahay wareerkii dadka ku dhacay markii Taallada Baabel, taasi oo ciqaab u ahayd aadanaha dembigooda ay ku diidayeen doonista Ilaah si iyaga looga ilaaliyo inay noqdaan kuwo is waafaqa oo midooba. Kitaabka *Jerome Biblical Commentary*, vol. 2, p. 172, ayaa aragtidan ku xoojinaya *diamezizō* ku sugan Fal 2:3, taasi oo ah midaan badanaa la adeegsan, laakiinse sidoo kale lagu adeegsaday Sebtuujiangiga Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8 ee kala kaxayntii Taallada Baabel. Rumaystayaasha haddaba maaha kuwo hadda lagu kala sooco qowmiyada! Eeg fiirada 9:22.

▣ **“dadkii badnaa ayaa isu yimid”** middani waxa laga qaadan karaa iyada oo ku timid agagaarka Macbadka maxaa yeelay dad sidaas u badani isuguma iman karaan qollad sare oo yar ama dariiqyada yaryar ee Yerusaaalem.

▣ **“Sidee baa midkeen waluba u maqlaa iyagoo ku hadlaya afkeenna aynu ku dhalannay?”** tani waxa ay ahayd mucjiso xagga maqalka ah, oon ahayn hadalka (aayadaha 8 iyo 11). Haddii dadkan badani ay dhammaantood ku hadlayaan luqado kala gedisan iyagoo mar qudha wada hadlaya waxay noqon lahayd wareer. Tanina waxa weeyi fahanka dib usoo celinta wareerkii la xidhiidha Taallada Baabel (Bilowgii 11).

Tani waa erayga Giriigga ah ee *dialektos* (cf. aayadda. 8), taasi ay ka timid kelmadda Ingiriisida ah ee “dialect.” Luukos eraygan in badan ayuu ku dhex adeegsanayaa Falimaha Rasuullada (cf. 1:19; 2:6,8; 21:40; 22:2; 26:14). Waxa loo adeegsaday iyadoo tusinaysa macnaha “luqad.” Si kastaba ha ahaatee, macnaha halkan waxa loogala jeedaa lahad. Yuhuuddani waxa ay maqleen wax ku saabsan Ciise iyagoo ku maqlay luqaddooda hooyo, taasina waxa ay iyaga calaamad ugu ahayd run sheegnimada farriinta cusub ee ku saabsan Ilaah iyo sida ay dunida oo dhan u koobsanayso!

2:7,12 U fiirso dhammaanba erayada kala gedisan ee ka hadlaya caadifadda aadka u sarraysa ee macnaha halkan.

1. *sunechō*, “yaabeen” (aayadda. 6)
2. *existēmi*, “fajaceen” (aayadda. 7)
3. *thaumazō*, “amakaageen” (aayadda. 7)
4. *diaporeō*, “u qaadan waayeen” (aayadda. 12)

▣ **“bal eeg, kuwan hadlaya oo dhammu miyaanay reer Galili ahayn?”** su’aashan saamaynta leh (filaysa jawaaba ah “haa”) waxa la isu waydiiyay lahadooda woqooyiga ah daraaddeed (lahjad, Matayos 26:73). Erayga ah “bal eeg” waxa ay ka tarjumaysaa erayga Giriigga ah ee *idou* (bal eeg), waxaana Falimaha Rasuullada iyo Luukos lagu dhex adeegsaday saddex iyo labaatan jeer.

2:9 “Bartiya iyo Mediya iyo Ceelaam, iyo kuwa deggan Mesobotamiya,” dhammaanba kooxahani waxa ay kasoo jeedeen Masobataamiya, halkaasoo Ibraahim looga yeedhay (Uur tii reer Kaldayiin, cf. Bilowgii. 11:28) iyo halkii Israa’iil iyo Yahuudah lagasoo mustaafuriyay (Ashuuriyan, iyo Baabilooniyaanka).

▣ **“Yahuudiya”** Maxa Yahuudiya loo dhex geliyay labo waddan oo kale oon la xidhiidhin? Maxaa loo diiwaan geliyay iyadoonu la socon shaqalku, taasi oo naxwe ahaan sax noqon lahayd? Maxay dadka reer Yahuudiya layaabka ugu noqotay in Galiiliyaanku ay ku hadlaan Aramaati? Su’aalahan daraaddood ayaa kuwo badani waxa ay soo jeediyeen khaladaad qoraalka ah oo meesha soo dhex galay iyo in eraygani uu tilmaamay ummad kale.

1. Tertullian, Augustine – Armeniya
2. Jerome – Siiriya
3. Chrysostom, Erasmus – Indiya
4. soo jeedimo casriya oo dheeraada ka eeg Bruce M. Metzger, kitaabkiisa *A Textual Commentary on the Greek New Testament*, p. 293.

2:9-10 “Kabbadokiya, iyo Bontos iyo Aasiya, iyo Farugiya iyo Bamfuliya,” kuwani waxay ahaayeen kooxo kasoo jeeday Turkiga casriga ah ee maanta.

2:10 “Masar iyo meelaha Liibiya oo Kuranaya ku wareegsan” waxa ay ahaayeen kooxo kasoo jeeda Waqooyiga Afrika.

▣ **“Rooma ka yimid”** Xujaajtii Yuhuudda ee goobtan ku Masiixiyobay waxa laga yaabaa asal ahaan inay kasoo jeedeen kaniisadda Rooma.

▣ **“kuwa raacsan labadaba”** kuwani waxay ahaayeen kuwii aan Yuhuudda ahayn balse qaatay diinta Yuhuudda waxaana laga rabay

1. inay dhowraan Sharciga Muuse
2. in ragga la gudo
3. in goob markhaatiyaal joogaan lagu baabtiiso
4. marka ay suurto gal noqoto inay qurbaan ku bixiyaan Macbadka

Dhamaantood waxa ay jooheen Yerusaaalem maxaa yeelay ragga Yuhuudda oo dhan waxa laga rabay inay xadiraan saddexda maalmood ee ugu muhiisan ciidda sanad walba (Baxniintii 23 iyo Laawiyiintii 23).

2:11 “Kereetee” tani waxa ay ahayd jasiirad wayn oo u dhowayd Turkiga. Waxaana laga yaabaa inay u taagneyd dhammaanba Jasiiradaha Aegiyaanka.

▣ **“Carabta”** waxa ay middani tilmaamaysaa kuwii kasoo farcamay Ceesaw. Waxa jiray qabiillo badan oo Caraba oo ku faafay koonfurta Bariga Dhow. Liiskanina waxa uu matalayaa dadka Yuhuudda ah ee qarnigii koobaad laguna yaqaanay dunida oo dhan. Waxa laga yaabaa in ay tahay tusaale la mida toddobaatanka luqadood ee dunida oo Yuhuudda calaamad ugu ahaa aadanaha oo dhan (Luukos 10). Fikraddan mid la mid ah waxa lagu sheegay Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8 ee LXX ka.

2:12 dadkan xujaajta ahi waxa ay qireen oo aqoonsadeen dhacdadan gaarka ah oo muhiimad calaamad u ah. Butrosna waxa uu ka jawaab celinayaan wakhtigaas isaga oo ka jawaabayaa su’aalooda.

2:13 “Kuwan waxaa ka buuxa” waa fal ebyan oo tusmayn sida, kaasi oo sheegaya in xertani ay khamri cabbeen iyaga oo gaadhay heer sarkhaanimu isla markaasna weli sarkhaansan.

▣ **“khamri cusub”** mid ka mida sida sharraxaadda xaaladdan looga bixinayay ayaa ahayd in kuwan raacay Ciise ay yihiin kuwo sarkhaansan (Efesos 5:18a). Sidee sarkhaanimadu u keeni kartaa awoodda luqad ku hadlidda? Waxa hubaa oo kale in ay jirtay xaalad farxad iyo rayn rayn ahi.

MAWDUUC GAAR AH: FIKIRKA KITAABKU KA QABO KHAMRIGA IYO KHAMRI CABNIMADA

- I. Kitaabku waxa uu ka sheegayo
 - A. Axdiga Hore

1. *Yayin*- waa erayga guud ahaan loo adeegsado khamriga canabadka laga sameeyo (BDB 406), waxaana la adeegsaday 141 jeer. Asalkeeda lama hubo maxaa yeelay maaha asal ahaan Cibraani.

Hadiyo jeerna waxa lagu magacaabi jiray khamiirka laga miiro khudaarka, badanaa canabka. Tusaale ahaan waxa ka mida aayadaha sheegaya Bilowgii 9:21; Baxniintii 29:40; Tirintii 15:5,10.

2. *Tirosh* – waa “khamri cusub” (BDB 440). Sababtuna waxay ahayd cimiladii Bariga Dhow saamaynteeda, oo marka khamriga la khamiiriyo lix saacadood kaddib ayuu ku samaysmi jiray. Eraygani haddba waxa uu sheegayaa khamri ku jira khamiirkii. Aayadaha wax ka sheegayana waxa ka mida Sharciga Kunoqoshadiisa 12:17; 18:4; Ishacyaah 62:8-9; Hoosheeca 4:11.
3. *Asis* – waa cabbitaan khamri ah leh alkohol (“khamriga macaan,” BDB 779, tusaale ahaan Yoo’eel 1:5; Ishacyaah 49:26).
4. *Sekar* – waa “khamri culus” (BDB 1016). Asal ahaan Cibraaniga waxa loogu adeegsaday “sarkhad.” Waxa aanu wataa waxyaalo lagu daray oo lagu sarkhaamay. Waxa uu la mid yahay *yayin* (Maahmaahyadii 20:1; 31:6; Ishacyaah 28:7).

B. Axdiga Cusub

1. *Oinos* – Waxay u dhigantaa erayga Giriigga ah ee *yayin*
2. *2.Neos oinos* (khamri cusub) – waxay u dhigantaa erayga Giriigga ah ee *tirosh* (Markos 2:22).
3. *Gleuchos vomos* (khamri macaan, *asis*) – khamri ku jira cusboonaantiisii (Falimaha Rasuullada 2:13).

II. Adeegsiisa

A. Axdiga Hore

1. Khamrigu waa hadiyadda Ilaah (Bilowgii 27:28; Sabuurka 104:14-15; Wacdiyihii 9:7; Hoosheeca 2:8-9; Yoo’eel 2:19,24; Caamoos 9:13; Sekaryaah 10:7).
2. Khamrigu waa qayb ka mida qurbaan ahaanta waxyaalaha loo bixiyo (Baxniintii 29:40; Laawiyiintii 23:13; Tirintii 15:7,10; 28:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 14:26; Xaakinnadii 9:13).
3. Khamriga waxa loo adeegsaday dawo ahaan (2 Samuu’eel 16:2; Maahmaahyadii 31:6-7).
4. Khamrigu wuxuu noqon karaa dhibaato (Nuux – Bilowgii 9:21; Luut – Bilowgii 19:33,35; Samson – Xaakinnadii 16:19; Nabaal – 1 Samuu’eel 25:36; Yuriyaah – 2 Samuu’eel 11:13; Amnoon – 2 Samuu’eel 13:28; Eelaah – 1 Boqorradii 16:9; Benhadaad – 1 Boqorradii 20:12; xukumayaashii – Caamoos 6:6; iyo Haweenkii – Caamoos 4).
5. Khamriga waa la caayay (Maahmaahyadii 20:1; 23:29-35; 31:4-5; Ishacyaah 5:11,22; 19:14; 28:7-8; Hoosheeca 4:11).
6. Khamriga waxa laga xarrimay kooxo khaas ah (wadaaddada xilka haya, Laawiyiintii 10:9; Yexesqeel 44:21; Nadiirka, Tirintii 6; iyo xaakinnada, Maahmaahyadii 31:4-5; Ishacyaah 56:11-12; Hoosheeca 7:5).
7. Khamriga waxa tusaale loogu adeegsaday wakhti iman doono (Caamoos 9:13; Yoo’eel 3:18; Sekaryaah 9:17).

B. Amaanitaankiisa kitaabiga ah

1. Khamrigu waxbuu caawiyaa (Wacdiyihii 31:27-30).
2. Rabbaaniyiintu waxay yidhaahaan “Khamrigu waa dawada ugu wayn, meesha aanu jirin khamrina waxa looga baahanaya dawooyin.” (BB 58b).

C. Axdiga Cusub

1. Ciise biyo badan ayuu khamri u beddelay (Yooxanaa 2:1-11)
2. Ciise wuxuu cabay khamri (Matayos 11:18-19; Luukos 7:33-34; 22:17ff).
3. Butros waxa lagu eedeeyay inuu cabay khamri cusub maalintii Bentakostiga (Falimaha Rasuullada 2:13).
4. Khamriga waxa loo isticmaali karaa daawo ahaan (Markos 15:23; Luukos 10:34; 1 Timoteyos 5:23).
5. Hogaamiyayaashu maaha inay noqdaan kuwo la caayo. Tan macneheedu maaha inay gebi ahaanba iska daayaan (1 Timoteyos 3:3,8; Tiitos 1:7; 2:3; 1 Butros 4:3).
6. Khamriga waxa loo adeegsaday tusaale ahaan (Matayos 22:1ff; Muujintii 19:9)
7. Sarkhaanimada waa la dhaleeceeyay (Matayos 24:49; Luukos 12:45; 21:34; 1 Korintos 5:11-13; 6:10; Galatiya 5:21; 1 Butros 4:3; Rooma 13:13-14).

III. Fahanka fiqi ahaaneed

A. Xiisadda lahad ahaaneed

1. Khamrigu waa hadyad Ilaah
2. Sarkhaanimadu waa dhibaato wayn

3. Rumaystayaasha dhaqamada qaarkood joogaa waa inay Injiilka dartiis u xadidaan xorriyadooda (Matayos 15:1-20; Markos 7:1-23; 1 Korintos 8-10; Rooma 14).
- B. Dabciga waxyaalaha la inasiiyay
1. Wax waloo wanaagsaniba Ilaabbay ka yimaaddaan
 2. Aadanaha leexday hadiyadii Ilaah waxay ka dhigeen eedayn
- C. Caydu inaga ayay inagu jirtaa ee kuma jirto waxyaalaha. Waxyaalaha Ilaah abuuray shar maaha (Markos 7:18-23; Rooma 14:14,20; 1 Korintos 10:25-26; 1 Timoteyos 4:4; Tiitos 1:15).
- IV. Yuhuuddii Qarnigii hore dhaqankooda iyo khamiirinta khamriga
- A. Khamiirinta waxay u bilaabmi jirtay si dhakhso ah, ku dhowaad 6 saacadoo kaddib marka canabka lasoo gooyo.
 - B. Dhaqanka Yuhuuddu waxa uu sheegayaa in faxitaanku ahaa calaamadda marka khamriga cusub diyaarka yahay (*Ma aseroth*). Waxaana lagu magacaabi jiray “khamri cusub” ama “khamri macaan.”
 - C. Khamiirintu ugu horraysaa waxay dhammaan jirtay hal usbuuc kadib.
 - D. Khamiirinta labaad waxa loo diyaarin jiray ku dhowaad 40 casho. Xaaladdan marka uu gaadhana waxa lagu tilmaami jiray “khamri gaboobay” waxaana la bixin jiray isagoo is beddelay (*Edhuyyoth* 6:1).
 - E. Khamriga soo hadha waxa lagu tilmaami jiray mid wanaagsan, laakiinse waxay ahayd in la hubiyo inta aan la isticmaalin ka hor.
 - F. Khamriga caadi ahaan gabowgiisa waxa la sheegi jiray marka uu gaadho halsano khamiirintiisa kadib. Saddex sano ayaa ahayd muddada ugu dheer ee khamriga la kaydin karayay. Waxa lagu magacaabi jiray “khamri gaboobay” waxaana lagu qasi jiray biyo.
 - G. Sanadihii u dambaysay ayaa dadku bardeen in muddo dheer wax la kaydin karo, Laakiin dunidii hore awood umay lahayn, inay hor istaagaan dabiicadda.
- V. Odhaahda xidhitaanka ah
- A. Hubi khibraddaada, fiqigaaga, iyo fasiraadda kitaabka hana hoos isaga dhigin Ciise iyo Yuhuuddii/Masiixiyiintii qarnigii koobaad dhaqankooda! Waxa caddayd inay ahaayeen kuwo aan si buuxda uga joogsanin.
 - B. Kuma baaqayo isticmaalka khamrada. Laakiinse dad badan ayaa siyaabo badan arrintan kitaabka ugu kala adeegsada kuna saleeya madaahib amaba dhaqamo.
 - C. Aniga Rooma 14 iyo 1 Korintos 8-10 ayaa isiiyay fahan ku salaysan jacaylka iyo tix gelinta rumaystayaasha, iyo sidii dhaqamadeena injiiku ugu faahi lahaa, taasi oon ahayn xorriyaddeena amaba dhaleecanteenna shakhsi ahaaneed. Haddii haddaba, kitaabku yahay meesha rumaysadkeennu ku tiirsan yahay, waxaan u baahanahay in mawduucan aan dib uuga fikirno.
 - D. Haddii dhammaanba dadka aan xakamayno inaga oo ka dhigayna doonista Ilaah, side ayaan Ciise u meteli karnaa, sidoo kalena maxaa laga yeelaya dadka dhaqan ahaanta u isticmaala khamrada (Europe, Israa’iil, Argentina)?

NASB (UPDATED) TEXT: 2:14-21

¹⁴laakiin Butros intuu koob- iyo tobankii isla taagay, ayuu sare u qaaday codkiisa oo ku yidhi iyaga, Niman yahow reer Yahuudiya iyo dhammaantiinan Yeruusaalem degganow, tan ogaada oo hadalladayda dhegaysta. ¹⁵Waayo, kuwanu ma sakhraansana sidaad u malaynaysaan inay sakhraansan yihiin; maxaa yeelay, tanu waa saacaddii saddexaad ee maalmeed. ¹⁶laakiin waxanu waa wixii lagaga dhex hadlay nebi Yoo'eel, ¹⁷Ilaah baa yidhi, Maalmaha ugu dambaysta waxyaalahanu waa noqon doonaan, Ruuxayga ayaan ku shubi doonaa dad oo dhan; Oo wiilashiinna iyo hablihiinnu wax bay sii sheegi doonaan. Raggiinna dhallinyarada ahuna wax bay arki doonaan, Odayaashiinnuna riyooyin bay ku riyoon doonaan; ¹⁸Haah, oo maalmahaas addoommadayda, rag iyo dumarba, Ruuxaygaan ku shubi doonaa, iyaguna wax bay sii sheegi doonaan. ¹⁹Oo waxaan samada sare ka muujin doonaa yaabab. Dhulka hoosena waxaan ka muujin doonaa calaamooyin, Kuwaas oo ah dhiig iyo dab iyo uumiskii qiiqa. ²⁰Qorraxdu waxay u beddelmi doontaa gudcur, Dayaxuna wuxuu u beddelmi doonaa dhiig, Intaanay iman maalinta Rabbigu, Taas oo ah maalin weyn oo caan ah. ²¹Oo waxay noqon doontaa in ku alla kii magaca Rabbiga ku dhawaaqaa, uu badbaadi doono.

2:14 “Butros” ka fikir xerta oo dhan, Butros waxa uu ahaa kii ugu horreeyay ee sameeyay wacdin Masiixiyadeed! Isagu waxa uu hore u ahaa kii saddex jeer dafiray Ciise (Luukos 23)! Isbeddelka ku yimid Butros ee ka kexeeyay fulaynimada iyo fahanka ruuxiga ahi waxa uu caddayn kale u yahay casriga Ruuxa oo ah kan beddelaya noloshu ee awoodaynaya. Tani waa wacdintiisa ugu horreysay ee ku qoran Falimaha Rasuullada. Waxa ay ina tusinaysaa waxa ay koobsanayso ee ay xoojinayso wacdintii Rasuulladu. Wacdintan Rasuulladuna waxa weeyi qayb muhiima oo kamida Falimaha Rasuullada.

MAWDUUC GAAR AH: WACDINTII KANIISADDII UGU HORRAYSAY

- A. Ballan qaadyadii Ilaah ku sameeyay Axdiga Hore waxay ku dhammays tirmeen imaatinka Ciise Masiix (Falimaha Rasuullada 2:30; 3:19,24; 10:43; 26:6-7,22; Rooma 1:2-4; 1 Timoteyos 3:16; Cibraaniyada 1:1-2; 1 Butros 1:10-12; 2 Butros 1:18-19).
- B. Ciise waxa loo doortay inuu yahay Masiixa markii la baabtiisayay (Falimaha Rasuullada 10:38).
- C. Ciise shaqadiisa wuxuu ka bilaabay Galilee markii la baabtiisay dabeed (Falimaha Rasuullada 10:37).
- D. Shaqadiisa waxa ku dheehnaa samaynta waxa wanaagsan iyo mucjisooyin ka tarjumaya awoodda Ilaah (Markos 10:45; Falimaha Rasuullada 2:22; 10:38).
- E. Masiixa waxa isku tallaabta loogu qodbay ujeeddada Ilaah daraaddeed (Markos 10:45; Yooxanaa 3:16; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:13-15,18; 4:11; 10:39; 26:23; Rooma 8:34; 1 Korintos 1:17-18; 15-18; 15:3; Galatiya 1:4; Cibraaniyada 1:3; 1 Butros 1:2,19; 3:18; 1 Yooxanaa 4:10).
- F. Waxa laga sara kiciyay dhimashada, waxaanu u muuqday xertiisii (Falimaha Rasuullada 2:24,31-31; 3:15,26; 10:40-41; 17:31; 26:23; Rooma 8:34; 10:9; 1 Korintos 15:4-7,12; 1 Tesaloniika 1:10; 1 Timoteyos 3:16; 1 Butros 1:2; 3:18,21).
- G. Ciise waxa sarraysiiyay Ilaah isagoo siiyay magaca “Rabbiga” (Falimaha Rasuullada 2:25-29,33-36; 3:13; 10:36; Rooma 8:34; 10:9; 1 Timoteyos 3:16; Cibraaniyada 1:3; 1 Butros 3:22).
- H. H.Wuxuu bixiyay Ruuxa Quduuska ah si uu u sameeyo dadka Ilaah ee cusub (Falimaha Rasuullada 1:8; 2:14-18,38-39; 10:44-47; 1 Butros 1:12).
- I. Wuu soo laaban doonaa isagoo kama danbaaysta adduunyada kala xukumi doona (Falimaha Rasuullada 3:20-21; 10:42; 17:31; 1 Korintos 15:20-28; Tesaloniika 1:10).
- J. Dhammaan kuwa helay farriintiisu waa inay towbad keenaan oo la baabtiiso (Falimaha Rasuullada 2:21,38; 3:19; 10:43,47-48; 17:30; 26:20; Rooma 1:17; 10:9; 1 Butros 3:21).

Dhammaanba waxyaalahani waxa ay ahaayeen wacdintii kaniisaddii hore, inkasta oo qorayaasha kala gedisan ee Axdiga Cusubi ay siyaabo kala gedisan ugu tilmaamayaan wacdintooda. Haddaba, gebi ahaanba injiilka uu qoray Markos ayaa waxa uu raacsan yahay wacdintan ay kaniisaddii hore samayn jirtay, waayo Markos asal ahaan waxa uu awoodda saarayaa oo qorayaa wacdiniihii Butros ka sameeyay Rooma. Sidoo kale Matayos iyo Luukos ayaa iyaguna raacaya qaabka Markos ee asaasiga ah.

☐ **“intuu koob- iyo tobankii isla taagay”** middani waxay tusinaysaa labo waxyaalood (1) Butros waa afhayeenka, laakiinse ilaa hadda waxa uu qayb ka yahay kooxda Rasuullada. Kelidiis hadli maayo ama awooddiisana ku hadli maayo. Ruuxa ayaa si gaar ah uuga dhex hadlayay kooxdan dhammanba loo yeedhay, ee ah markhaatiyaasha goob joogga ah iyo (2) Matiyas, in kastoo aynaan waxba ka aqoonin isaga iyo adeeggiisa, waxa uu si gaara uuga qayb noqday kooxdii Rasuullada.

☐ **“Niman yahow reer Yahuudiya iyo dhammaantiinan Yeruusaalem degganow”** dadka halkan lagula hadlayaa waxa ay u muuqdaan inay ka duwanyihiin xujaajta dadka badan isugu jira ee kala dhalashooyinka ah sida ku sugan aayadaha 7-11.

☐ **“tan ogaada oo hadalladayda dhegaysta”** labadaniba waxa weeyi amarro. Midka hore waxa weeyi fal wakhti xaadirka jooga halka ka labaadna ka yahay mid ah wakhtiga tegay. Butros waxa uu rabaa inay daroonkooda siiyaan isaga.

Ereyadani waxa weeyi Semitic, waxaana la adeegsaday labo jeer iyadoo hordhac u ah wacdimaha Butros (cf. 2:14; 4:10) iyo labo jeer oo iyana Bawlos ah (cf. 13:38; 28:28). Luukos muu ahayn Yuhuudi laakiinse waxa uu Masiix noqday isagoo hana qaad ah. waxyaalahani waxa ay ina tusinayaan in Luukos aanu ahayn ka sameeyay wacdimaha ku sugan Falimaha Rasuullada isagoo ku salaynaya fahankiisa, laakiinse isagoo run sheegaya ayuu arrintan soo koobayaa.

2:15 “kuwanu ma sakhraansana” Butros waxa uu ka jawaab celinayaa waxyaalaha laga sheegay ee ku sugan aayadaha 13, waxaanu sheegayaa in wakhti hore ay tahay oo dadka Yuhuudduna aanay wakhtigaas cabbin khamro. Middani waxa ay raacaysaa fasiraadda rabbaaniyiinta ee Baxniintii 16:8 (cf. E. M. Blaiklock, Tyndale NT Commentary Series, *Acts*, p. 58).

▣ **“waa saacaddii saddexaad ee maalmeed.”** Waxa ay noqonaysaa 9:00 a.m. waxa ay ahayd subaxnimada maalintaa qurbaanka ee Macbadka dhexdiisa. Waxa ay ahayd wakhti gaara oo Yuhuuddu ay tukadaan. “saacadda saddexaad” waxa weeyi goorsheegta Yuhuudda. Qorayaasha Axdiga Cusub (gaar ahaan Yooxanaa) waxa ay adeegsanayaan goorsheegta Roomaanka iyo ta Yuhuudda labadaba.

2:16 “waxanu waa wixii lagaga dhex hadlay nebi Yoo'eel,” waa xigasho ka ahaatay Yoo'eel 2:28-32 ee Sabtuujantiga. Ciise laftiisa ayaa laga yaabaa inuu ahaa qofka soo saaray ee sheegay qaybtan waxsii sheegista ah ee la dhammays tiray (Luukos 24:27,45).

2:17 “Maalmaha ugu dambaysta” erayadani waa Luukos is raacintiisa qoraallada Sebtuujantiga. Axdiga Hore dhexdiisa ereyadani waxa ay sheegayeen dhammaadka wakhtiga iyo imaatinka Casriga Masiixa. Axdiga Cusub dhexdiisa “maalmaha ugu danbeeyaa” waxa ay sheegayaan is beddelka labada casri ee Yuhuudda. Casriga Cusubi waxa uu ku bilaabmay Ciise oo jidh aadane kusoo qaatay Beytlaxam waxaanu jirayaa ilaa Imaatinkiisa Labaad. Waxa aan inagu ku dhex noolnahay dareenka u dhexeeya “mar hore” iyo “weli maya” ee Boqortooyada Ilaah. Eeg Mawduucan Gaark ah.

MAWDUUC GAAR AH: FACAN IYO FACA IMAN DOONA

Nebiyadii Axdigii Hore waxay mustaqbalka ku muujiyeen badnaanta waqtiga la joogo. Iyaga ahaan mustaqbalku waxa uu u ahaan doonaa dib u soo celinta Israa'iil ee xagga dhulka. Arrintu si kastaba ha ahaatee, xitaa waxa ay arkeen maalin cusub (cf. Ishacyaah 65:17; 66:22). Diidmadii soo noqnoqonaysay ee ay YHWH ku diideen farcankii Ibraahim (xitaa masaafurintii kaddib) tusaale cusub ayaa Yuhuuddii ka dhex samaysmay sida ku qoran Qoraallada intertestamental apocalyptic ee (i.e., I Enoch, IV Cesraa, II Baruch). Qoraalladani waxa ay bilaabeen in ay kala badhaan labada fac: facan jooga ee sharka leh ee uu shaydaanka u taliyo iyo faca iman doonaa ee uu u taliyo Ruuxa oo ku Masiixa ku jira (askari mar kasta awood leh).

Barashada fiqiganee (eschatology) wax horumar cad ihi kama muuqdo. Dadka fiqigu waxay miidan ugu yeedhaan “progressive revelation” “muujin waxtar leh.” Axdiga Cusub waxa uu qirayaa runtan runtan caalamiga ah ee ee labada fac ama jiil (i.e., temporal dualism) (deegaan ku meel gaar ah):

<u>Ciise</u>	<u>Bawlos</u>	<u>Cibraaniyada</u>
Matayos 12:32	Rooma 12:2	1:2
Matayos 13:22 & 29	I Korintos 1:20; 2:6,8; 3:18	6:3
Markos 10:30	II Korintos 4:4	11:3
Luukos 16:8	Galatiya 1:4	
Luukos 18:30	Efesos 1:21; 2:1,7; 6:12	
Luukos 20:34-35	I Timoteyos 6:17	
	II Timoteyos 4:10	
	Tiitos 2:12	

Fiqiga Axdiga Cusub ee labadan fac ee Yuhuudda waa la daboolay sababtuna waa filasho la'aanta iyo saadaalinnada labada imaansho ee Masiixa. Dhalashadii labaad ee Ciise ayaa kaamishay wax sii sheegidyadii Axdigii Hore ee ku soo bixidda faca cusub. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Axdigii Hore xataa waa uu arkay u imaanshadiisii sida xaakin iyo mid aan laga guulaysan Karin, welibase wuxu markii koowaad u yimid sidii Adeege Silcaya (cf. Ishacyaah 53), oo is hoosaysiinaya (Sekariyaah 9:9). Sidoo uu Axdigii Hore u saadaaliyey awood ayuu la soo noqon doonaa (cf. Muujintii 19) labadan hab ee kaamilista ah ayaa Boqortooyada ka dhigtay mid haddadan joogta (lagu dhex jiro) laakiin mustaqbalka ah (aan dhammaan la wada kaamilim). Tan ayaa ah xiisadda uu Axdiga Cusub qabo ee ah durba, maaha weli!

▣ **“Ilaah baa yidhi”** Codex Bezae, MS D, ayaa dhigaya *kurios* (Rabbi). Haddaba *Kurios* ma wuxuu tilmaamayaa YHWH Axdiga Hore mise Ciise, Masiixa? Waxa hubaala oo suurto gal ah in *Theos* (Ilaah) in ahayd arrin culimadu ay ku caddayn jireen cidda hadlaysay.

▣ **“Ruuxayga ayaan ku shubi doonaa dad oo dhan”** Fiiro u yeelo arrinta caalamiga ah (aayadda 39). Dhammaanba dhaqammadii hore waxa ay ku dhaceen Masiixa (cf. I Korintos. 12:13; Galatiya. 3:28; Efesos. 3:6; Kolosay. 3:11). Inkastoo aanu jirin kala saarista Yuhuud iyo kuwa aan Yuhuud ahayn oo lagu sheegay Yoo’eel 2, u fiirso aayadda 38, taasi oo tusinaysa kala soocid la’aan. YHWH waxa uu Ruuxiisa la wadaagayaan dhammaanba aadanaha uu ka sameeyay ekaanshihiisha, kaasi oo lagu sheegay Bilowgii 1:26-27.

▣ **“Ruuxayga ayaan ku shubi doonaa dad oo dhan Oo wiilashiinna iyo hablihiinnu wax bay sii sheegi doonaan.”** Waxa ay tani noqon kartaa dhammaystirka gaarka ah ee Tirintii 11:29. Fiiro u yeelo iyada oon rag iyo dumar la kala soocin.

MAWDUUC GAAR AH: DUMARKA KU JIRA KITAABKA QUDDUUSKA AH

I. Axdigii Hore

A. Dhaqan ahaan waxaa dumarka loo haystay sidii hanta oo kale

1. Waxay ku jireen liiska hantida (Baxniintii 20:17)
2. La macaamalkii haweenka addoonta ah (Baxniintii 21:7-11)
3. Ballammada haweenka oo ay raga masuuliyiinta ahi joojin karaan (Tirintii 30)
4. Haweenka oo loo arko in ay yihiin kuwa dagaalka huriya ama sii shida (Sharciga Ku Noqoshadiisa 20:10-14; 21:10-14)

B. Waxa si la taaban karo u jiray xidhiidh labo dhinacle ah

1. Rag iyo dumar waxaa laga abuuray ekaanta Ilaah (Bilowgii 1:26-27)
2. Maamuus aabbaha iyo hooyada (Baxniintii 20:12 [Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:16])
3. Xushmee hooyada iyo aabbaha (Laawiyiintii 19:3; 20:9)
4. Raga iyo dumarku waxa ay noqon lahaayeen Nadiirka (Tirintii 6:1-2)
5. Gabdhaha la dhalay waxa ay xaq u leeyihiin dhaxalka (Tirintii 27:1-11)
6. Qayb ka mid ah dadkii Axdiga (Sharciga Ku Noqoshadiisa 29:10-12)
7. U kuur galka wax baridda aabbaha iyo hooyada (Maahmaahyadii 1:8; 6:20)
8. Wiilasha iyo gabdhaha Xeebam (qoys reer Laawi ah) oo muusikada Macbudka hoggaaminayey (I Taariikhadii 25:5-6)
9. Wiilasha iyo gabdhuhu wax bay sii sheegi doonaan jiilka cusub dhexdiisa (Yoo’eel 2:28-29)

C. Haweenku doorar ayey ku lahaayeen hoggaanka

1. Muuse walaashii Maryama, oo loogu yeedhay in ay tahay nebiyad (Baxniintii 15:20-21 sidoo kale ogsoonow Miikaah 6:4)
2. Haweeney Ilaah hibo u siiyey in alaabada u tidicdo teendhada (Baxniintii 35:25-26)
3. Naagtii, la odhan jiray Dibooraah, oo sidoo kale ahayd nebiyad (cf. Xaakinnada 4:4-5; 5:7)
4. Xuldaah waxa ay ahayd nebiyad uu Boqor Casaayaah ku soo rogay in ay aqriso oo ay tarjunto “buuggii sharciga” ee cusbaa ee la helay (II Boqorrada 22:14; II Taariikhda 34:22-27)
5. Boqoradii Ester ee ahayd haweeney Ilaah aaminsan, oo badbaadisay Yuhuuddii Beershiya joogtay

II. Axdiga Cusub

A. Xilligii dunidii Yahuudiya iyo Roomankii Yeriixoo dhaqan ahaan dumarkii joogay waxa ay ahaayeen ilbixiin heerla labaad taagan kuwaasoo lahaa xoogaa xuquuqo iyo muhiimado ah (tan ka baxsan waxa ay ahayd makedooniya).

B. Haweenii ku jiray doorarkii hoggaaminta

1. Elisabed, iyo Maryan, oo ahaa dumar Ilaah raalli ka ahaa (Luukos 1-2)

2. Aana, haweeney Ilaah aamminsan , oo macbudka ka shaqan jirtay (Luukos 2:36)
3. Ludiya, rumayste iyo hoggaamiye kaniisad guri (Falimaha Rasuullada 16:14,40)
4. Filibos afartiisii gabdhood ee bigradaha ahaa waxa ay ahaayeen nebiyado (Falimaha Rasuullada 21:8-9)
5. Foybi, oo ah wadaad u adeegta kaniisaddii ku tiil Kenekhreya (Rooma 16:1)
6. Bariska (Bariskilla) waday Bawlos la shaqaynaysa iyo macallimaddii Aboolos (Falimaha Rasuullada 18:26; Rooma 16:3)
7. Maryan, Turufayna, Turufoosa, Bersis, Yulya, Neere'us walaashiis, waa dhowr dumar ah oo la shaqaynayey Bawlos (Rooma 16:6-16)
8. Yuniyas (KJV), waxaa macquul ah in rasuulad tahay (Rooma 16:7)
9. Yu'odiya Suntukhee, kuwo rasuul Bawlos la shaqayn jiray (Filiboy 4:2-3)

III. Sidee buu rumayste casrigan joogaa u isugu qiyaasi tusaalooyinka kala duwan ee Baybalka?

A. Sidee buu qof go'aan uga gaadhi karaa run taariikh ama dhaqan ku aaddan, oo tilmaamaysa oo qura macnaha dulucda asalka ah, oo ka timid runta weligeed ah ee kaniisadaha iyo rumaystayaasha oo dhan fac kasta oo ay ahaayeen ansax u ah?

1. Waa in aan si ku taloggal leh u qaadanaa qoraagii asal ahaan loo waxyooday weliba si dhab ah. Kitaabka Qudduuska ahu waa Ereyga Ilaah waana isha keliya ee laga helo rumaysad iyo wax qabashada ficilka ah.
2. Waa in aan si cad u qaadanaa xaaladdii taariikha ahaan qoraalka loo waxyooday
 - a. Caadooyinkii Reer Israa'iil (Falimaha Rasuullada 15; Galatiya 3)
 - b. Habkii Yuhuudda ee qarnigii koowaad
 - c. Bawlos hadalladiisii sida cad ee taariikhiga uahaa sida ku jirta I Korintos
 - (1) Habka caadiga ah ee diinlaawayaashii Rooma (I Korintos 6)
 - (2) Kuwii addinsiga ku sii hadhay (I Korintos 7:20-14)
 - (3) Celibacy (I Korintos 7:1-25)
 - (4) Bikrooyinkii (I Korintos 7:36-38)
 - (5) Cunnadii loo bixiyey sanamka (I Korintos 8; 10:23-33)
 - (6) Ficillada aan ku habboonayn Cashada Rabbiga (I Korintos 11)
3. Ilaah si cad oo buuxda ayuu isugu muujiyey dhaqan gaar ah maalin gaar ah. Waa in aan si dhab u qaadanaa muujinta, laakiin ma aha qaab kasta oo ay taariikhda ugu jirto. Ereyga Ilaah waxaa loo adeegsaday oo lagu qoray ereyo aadane, oo lagu hagaajiyey dhaqan gaar ah iyo saacad gaar ah.

B. Tarjumaadda Baybalka waa in lagu raadiyaa ku talogalkii qoraaga ee asalka ahaa. Muxuu maalintiisaas sheegayey? Tani waxa ay aasaas ahaan iyo muhiimadahaan u leedahay tafsiirka gaar ah. Laakiin intaas dabadeed waa in aan middan ku dhaqan gelinaa waqtigeennan aan joogno. Hadda, halkan waxaa ah in haweenku ka qayb qaataan hoggaaminta (dhibaataada runta ee tafsiirku waxa uu noqon karaa sida loo qeexayo ereyga. Miyey jiraan adeegyo ka badan kuwa wadaaddada kaniisadda kuwaasoo loo arkay sidii hoggaamin? Miyaa adeegtooyinkii iyo nebiyadihii loo arkay sidii hoggaamiyeyaal? Waa xigasho cad in sida ku jirta I Korintos 14:34-35 iyo I Timoteyos 2:9-15, ay tahay timaal uu Bawlos ku sheegayo in haweenku ayan hoggaan ka noqon caabidaadda! Laakiin sideebaan taas u dhaqan gelin karaa maanta? Ma doonayo in dhaqankii Bawlos ama dhaqankaygu ay aammusiyaan Ilaah Ereygiisa iyo doonistiisa. Arrinta macquulka ahi waxaa weeye in xilligii bawlos aad u xadaysnaayeen, maalintaydan aad ayey y furan tahay. Raaxo darro ka dareemayaa in aan idhaahdo ereyadii iyo wax baridyadii Bawlos waa xaalad, qarnigii koowaad deegaanka ka jirta oo shuruud ahayd. Kumaan ahay marka aan maankayga iyo dhaqankayga u diido wixii qoraa loo waxyooda?!

Arrintu si kastaba ha ahaatee, maxaan sameeyaa marka ay jiraan tusaalooyin baybalka ah oo ku saabsan haween hoggaamiyeyaal ah (xitaa qoraallada Bawlos dhexdooda, cf. Rooma 16)? Tusaale wanaagsan waxaa ah falanqaynta Bawlos ee ku aaddan caabudaadda dadweynaha sida ku jirta I Korintos 11-14. Sida ku jirta 11:5 waxa ay u muuqataa in uu oggol yahay in haweenka wacdigooda

iyo salaaddooda dadka dhexdiisa iyagoo madaxoodu uu daboolan yahay, welise sida ku jirta 14:34-35 waxa uu ka dalbanayaan in ay aammusnaan ku joogaan! Waxaa jiray adeegtooyin (cf. Rooma 16:1) iyo nebiyado (cf. Falimaha Rasuullada 21:9). Tan ayaa ah kala duwanaashaha ii oggolaanaya xorriyadda aan ku caddaynayo ama ku muujinayo faalladii Bawlos (ee la xidhiidha xaddidaadda haweenka) si loogu xadeeyo sidii qarnigii koowaad ee Korintos iyo Efesos. Labada kaniisadoodba waxaa ka jiray dhibaatooyin ah sidii ay haweenku xorriyaddoodan cusub ee ay heleen ficil ahaanta ugu adeegsanayeen (cf. Bruce Winter, *After Paul Left Corinth*), kaasoo ku keenay culays kaniisaddu in ay dadkeeda ku gaadho Masiixa. Waxa ay ahayd in xorriyaddooda la xaddido si uu Injiilku u noqdo mid saamayn badan leh.

Maalintaydu markan waa ay ka soo hor jeedaa tii Bawlos. Maalintaydan dhexdeeda, injiilka ayaa mid xadaysan ahaanaya haddii lagu soo daro, haweenka tababbaran looma oggola in ay injiilka dadka la wadaagaan, oo looma oggola in ay wax hoggaamiyaan. Haddaba, haddii ay sidaas tahay, muxuu noqonayaa yoolka ugu dambeeya ee sida ay dadku Ilaah u caabudayaan? Miyeyaan ahayn wacdin iyo xerkadhigid? Miyaa Ilaah lagu maamuusi karaa oo looga farxin hoggaamiyeyaal dumar ah? Baybalka guud ahaan waxa uu u muqdaa in uu leeyahay “haal”!

Waxaan doonayaa in aan ka midho dhaliyo qoraalka Bawlos. Aniga fiqigaygu waa kii Bawlos. Ma doonayo in si aadah ay ii saameeyaan ama qasab wax iigu qasbaan qaabkan casriga ah ee haweenka! Arrintu si kastaba haahaatee, waxaa an dareemayaa in kaniisaddu ay aad uga gaabisay in ay ku jawaabto runta cad ee Baybalka, sida addoonsiga aan ku habboonayn, cunsuriyadda, eexda, jinsi raaca. Waxaa sidoo kale laga gaabiyey in si ku habboon looga jawaabo cayda ama gefka haweenka loo gaysanayo waqtigan asriga ah. Ilaah oo Masiixa ku jira ayaa xoreeyay addoonkii iyo haweenkii. Ma oggolaanayo in dhaqanku uu xidhxidho qoraalka.

Hal tilaan oo dheeraad ah: Tafsiire ahaan waxaan ogsoonahay Korintos ay ahayd kaniisad uu aad rabash uga dhex jiro. Hadiyadihii ayaa qiimo lagu qaatay oo dibadda la soo dhigtay. Waxaa dhacda in dumarka sidan awgeed loo qabtay. Waxaa sidoo kale rumaysnahay in macallimiin been ahi ay waxyeello u geysteen kaniisadd Efesos kuwaasoo qaadanaayey faa'idada haweenka oo gashanayey booska kuwa hadlaya guryaha kaniisadaha ah ee Efesos dhexdooda.

C. Soo jeedinno ku saabsan akhrin dheeraad ah

How to Read the Bible for All Its Worth oo ay qoreen Gordon Fee iyo Doug Stuart (bogagga 61-77)

Gospel and Spirit: Issues in New Testament Hermeneutics oo ay qoray Gordon Fee

Hard Saying of the Bible oo ay qoreen Walter C. Kaiser, Peter H. Davids, F. F. Bruce, iyo Manfred T. Branch (bogagga 613-616; 665-667)

▣ **“waxsii sheegis”** ugu yaraan waxa jirta labo siyaabood oo loo fahmi karo eraygan: (1) sida ku sugan Korintos eraygani waxa uu tilmaamayaa la wadaagista ama ku wacdinta injiilka

(cf. 14:1; Fal 2:17) (2) kitaabka Falimaha Rasuulladu waxa uu sheegayaa nebiyo (cf. 12:27; 13:1; 15:32; 22:10, xitaa nebiyad, 21:9), kuwaasoo mustaqbala waxsii sheegi doona (eeg Mawduuca Gaarka ah 11:27).

Dhibaataada ka taagan eraygani waxa weeyi, sidee ayaa hadiyadda nebinimada ee Axdiga Cusubi ay uula xidhiidhaa nebiyada Axdiga Hore? Axdiga Hore dhexdiisa nebiyadu waxa weeyi qorayaasha Qorniinka. Axdiga Cusub dhexdiisa shaqadan waxa la siiyay oo keliya Labo iyo Tobankii Rasuul iyo kuwii caawinayay. Sida erayga “rasuul” loogu sheegay isaga oo ah hadiyad soconaysaa (Efesos 4:11) laakiin haddan waa la joojiyay, mana jiro Qorniin dheeraada oo waxyi ahi (Yuudas 3,20). Nebiyada Axdiga Cusub shaqadooda ugu horraysaa waa faafinta injiilka, laakiin sidoo kale waa shaqo gaar ah, waxaana suurto gala inay tahay sida xaqiiqooyinka Axdiga Cusub loogu dabaqayo xaaladaha iyo baahiyaha jira.

▣ **“dhallinyarada...odayaasha”** u fiirso iyadoo aanay jirin da'da oo wax lagu kala soocayo.

2:18 “addoommadayda” u fiirso iyada oo dadka aan midab kala sooc lagu samaynayn. Butros waxa uu ku daray erayga “waxsii sheegis” waxsii sheegista Yoo'eel. Kuma jirto qoraalka Masooritiga Cibraaniga ama Sebtoojantiga, laakiin waxa lagasoo qaatay aayadda 17.

Sida Luukos 24 (aayadaha. 3,6,12,17,32,36,40,51) uu u leeyahay kala duwanaansho qoraallada ah, ayaa Falimaha Rasuulladuna yahay (i.e., 2:11,18,37,44). Kala duwanaanshahani waxa uu hadiyo goor la xidhiidhaa qoraalka gaaban ee laga helayo MS D (Bezae ee qarnigii shanaad) iyo inyar oo kamida Laatiinkii Hore (qarnigii shanaad). Hadiyo goorma qoraal gacmeedyada la qoyska ah reer galbeedku waxa ay ku darayaan erayo, laakiin Luukos/Falimaha Rasuullada waxa ay leedahay akhriyada gaaban. Badanaa tarjumaadaha Ingiriisidu waxa ay kusoo darayaan dhammaanba qoraal gacmeedyada la qoyska ah Aleksanderiyaanka ee dhaadheer.

Eeg Hordhaca Falimaha Rasuullada, “Odhaadha furitaanka,” E.

2:19-20 luqaddan apoklaybtigga ah ayaa Butros waxa uu ku sheegayaa in arrintan la dhammays tiray, haddana waxyaalaha dabiici ahaan la yaabka leh midna weli masoo aroorin, marka laga reebo suurtagalnimada mugdiga markii Ciise uu saarnaa iskutallaabtaa korkeeda. Waxa ay ku hadlaysaa luqad tilmaamaysa imaatinka Abuuraha iyo xukunka. Axdiga Hore dhexdiisa imaatinkiisu waxa uu ahaa barakadayn ama xukun. Dhammaanba makhluuqaadkuna waxa ay udhaqaaqayaan sida uu rabo (cf. Ishacyaah. 13:6ff iyo Caamoos 5:18-20). Axdiga Hore dhexdiisa ma jirto kala saarista u dhaxaysa Jidh soo qaadashada (imaatinka hore) iyo *parousia* (imaatinka labaad). Yuhuuddu waxa keliya oo ay filayeen imaatin keliya iyo xaakinka awoodda badan. Kitaab ku saabsan luqada abokalaybtigu waa D. Brent Sandy, *Plowshares and Pruning Hooks: Rethinking Prophetic and Apocalyptic Language*

MAWDUUC GAAR AH: SUUGAANTA ABOKALAYBTIGA

(mawduucan gaarka ah waxa lagasoo qaatay tafsiirkayga kitaabka Muujintii)

Kitaabka Muujintii waxa weeyi qoraalkiisu waa Yuhuud nooca abokalybtiga ah. Waxa badanaa loo adeegsaday wakhtiyada lagaga hadlayo Ilaah oo taariikhda maamulaya iyo isaga oo dadkiisa u keeni doona gargaarka. Qoraalka ama suugaanta noocan ah waxa ay ku caan ahayd:

1. dareenka xooggan ee sida Ilaah dunida awoodda ugu leeyahay (kuwa tawxiidka leh iyo kuwa kaleba).
2. loollanka u dhexeeya sharka iyo khayrka, casrigan iyo casriga iman doona (labonimada).
3. adeegsiga ereyada sirta ah (hadiyo goor ka ahaaday Axdiga Hore ama qoraallada abokalaybtiga).
4. adeegsiga midabbada, tirooyinka, xayawaanka, mararka qaarna xayawaanka iyo aadanahaba.
5. adeegsiga dhex dhexaadinta ku timaadda malaa'igta iyadoo ah riyoooyin, laakiinse hadiyo goor malag ayaa dhexdhexaad u ah.
6. asaas ahaan waxay diiradda saarayaan dhammaadka wakhtiga (casriga cusub)
7. adeegsiga calaamado gaar ah, oon run ahayn si loo gudbiyo farriinta dhammaadka wakhtiga.
8. tusaalayaal noocan ka mid ahi waa:
 - a. Axdiga Hore
 - (1) Ishacyaah 24-27, 56-66
 - (2) Yexesqeel 37-48
 - (3) Daanyeel 7-12
 - (4) Yoo'eel 2:28-3:21
 - (5) Sekeryaah 1-6, 12-14
 - b. Axdiga Cusub
 - (1) Matthew 24, Mark 13, Luke 21, and I Corinthians 15 (in some ways)
 - (2) II Tesaloniika 2 (badnaa)
 - (3) Muujintii (cutubyada 4-22)
 - c. qoraallada kale (waxa lagasoo qaatay D. S. Russell, *The Method and Message of Jewish Apocalyptic*, pp. 37-38)
 - (1) I Enoch, II Enoch (the Secrets of Enoch)
 - (2) The Book of Jubilees
 - (3) The Sibylline Oracles III, IV, V
 - (4) The Testament of the Twelve Patriarchs
 - (5) The Psalms of Solomon

- (6) The Assumption of Moses
- (7) The Martyrdom of Isaiah
- (8) The Apocalypse of Moses (Life of Adam and Eve)
- (9) The Apocalypse of Abraham
- (10) The Testament of Abraham
- (11) II Esdras (IV Esdras)
- (12) Baruch II, III

9. Waxa jira macne lamaane ah oo noocan laga helayo. Waxa ay xaqiiqada u arkayaan sidii taxane lamaane ah, waxyaalo farqi u dhexeeya, ama dareenno:
- a. samada- dhulka
 - b. casriga sharka (aadanaha sharka ah iyo malaa'igaha sharka ah) –da'da casriga ah ee xaqnimada (aadanaha iyo malaa'igaha cibaadada leh).
 - c. jiritaanka wakhti xaadirka – jiritaanka mustaqbalka

Dhammaanba waxyaalahani waxa ay u soconayaan sidii oo ay yihiin waxyaalo Ilaah keenay. Tani maaha dunida sida uu ka rabay, laakiinse waa uu socodsiiinayaa, shaqaynayaa, doonistiisuna wuu meel marinayaa isaga oo soo celinaya is weheshigii ka bilaabmay Beer Ceeden. Masiixuna waxa uu muhiim u yahay qorhaha Ilaah, laakiinse labada imaatin waxa ay keeneen waxyaalo ku saabsan waxyaalahan hadda jooga ee lamaanaha ah.

2:20“maalinta wayn ee Rabbiga” erayga “ammaanta” ayaa waxa ay ka ahaatay *epiphaneia*, taasoo badanaa loo adeegsaday Imaatinka Labaad ee Ciise (cf. I Timoteyos. 6:14; II Timoteyos. 4:1; Titos 2:13). Eeg Mawduucan Gaarka ah:

MAWDUUC GAAR AH: IMAATINKA LABAAD

Waxa weeyi macno ahaan “*ilaa parousia da,*” taasoo loogala jeedo “joogitaanka,” waxaana loo adeegsaday booqashada boqortooyo. Erayada kale ee Axdiga Cusub ee loo adeegsaday Imaatinka Labaadna waa (1) *epiphaneia*, “muuqasho fool ka fool ah”; (2) *apokalupis*, “aan qarsoonayn”; iyo (3) “Maalinta Rabbiga” erayadanna farqibaa u dhexeeya.

The NT as a whole is written within the world-view of the OT, which asserted Axdiga Cusub gebi ahaanba waxa lagu qoray aragtida dunida ee Axdiga Hore, taasi oo sheegtay:

- 1. wakhti xaadirkan sharka ah, casriga caasinimada
- 2. imaatinka casriga xaqnimada
- 3. middani waxay ku iman doontaa adeegga Ruuxa iyo shaqada Masiixa (kan Lasubkay).

Arrinta fiqi ahaaneed ee la xidhiidha fikirka muujinta koritaanka ku jirta waa loo baahan yahay maxaa yeelay Axdiga Cusub qorayaashiisu waxa ay wax ka bedelitaan ku sameeyeen waxyaalihii Israa'iil ay filayeen. Halkii laga filayay milatari iyo qowmiyadnimo (Israa'iil) imaatinkeeda uu keenayo Masiixu, ayaa waxa jira labo imaatin. Midka koobaad waxa uu ahaa ilaahnimada oo soo qaadatay jidh bani aadam iyadoo ku timid dhalashada Ciisihii reer Naasereet. Waxa uu yimid isagoon ciidan wadanin ama wax xukumaynin balse ah “adeegaha silcaya” ee Ishacyaah 53; iyo isagoo sidoo kale fuushan dameer (oon fuushanayn faras dagaal ama wax la mida), sida ku sugan Sekeryaah 9:9. Imaatinka hore waxa uu ahaa Casriga Cusub ee Masiix, Boqortooyada Ilaah ee dhulka dushiisa. Dhinac marka laga eego boqortooyada waa halkan, laakiinse weli maaha. Waa arrinta u dhaxaysa labada imaatin ee Masiixa kaasi oo samaynaya macnihii labada casri ee Yuhuudda oo kale kaasoo ahaa midaan la arkayn, ama ugu yaraan aan ka dhex caddayn Axdiga Hore. Xaqiiqadii, xoojintani waxa ay tusinaysaa YHWH oo u diyaar ah inuu denbiyada aadanaha oo dhan cafiyo (cf. Bilowgii. 3:15; 12:3; Baxniintii. 19:5 iyo wacdintii nebiyada, gaar ahaan Ishacyaah iyo Yoonis).

Kaniisaddu sugi mayso dhammaystirka waxsii sheegyadii Axdiga Hore maxaa yeelay badanaa waxsii sheegado waxa ay sii sheegayaan imaatinka hore (cf. *How to Read the Bible For All Its Worth*, pp. 165-166). Waxa rumaystayaashu ay sugayaani waa imaatinka Boqorka Boqorrada iyo Rabbiga Rabbiyada ee la

sarakiciyay, waana dhammaystirka taariikh ahaaneed ee loo filayo casriga xaqnimada ee dhulka guudkiisa iyadoo la mid noqonaysa samada (Matayos 6:10). Waxyaalaha Axdiga Hore lagagasii hadlay may ahayn kuwo aan sax ahayn, laakiinse waa kuwo aan dhammays tirnayn. Waxa uu marlabaad u iman doonaa sida ay nebiyadu usii sheegeen isagoo ku iman doona awoodda YHWH. Imaatinka Labaad maaha eray kitaabi ah, laakiinse waa fikir dunida khuseeya isla markaasna ka muuqanaya Axdiga Cusub gebi ahaatiisa. Ilaah ayaa wax walba sixi doona iyadoo markaasna is weheshiga ka dhexeeya aadanaha laga sameeyay ekaanishihiisu ay noqon doonaan kuwo dib loo soo celiyo. Sharka waa la xukumi doonaa waana laga takhalusi doonaa, ujeedooyinka Ilaahna maaha kuwo guul darraysan doona!

2:21 “ku alla” halkan waxa ku sugan markale arrinta caalamiga ah (aayadaha 17 iyo 39. Ciise waxa uu u dhintay denbiyada dunida oo dhan (cf. Yooxanaa 1:12; 3:16; 4:42; I Timoteyos. 2:4; Titos 2:11; II Butros. 3:9; I Yooxanaa 2:1; 4:14). Fiiro u yeelo iyada oo Ruuxu u ahaaday aadanaha oo dhan (aayadda 17).

▣ **“kii ku dhawaaqa”** Waa fal tegay wakhti hore. Ka jawaab celinta aadanuhu waxa ay qayb ka tahay qorshaha Ilaah ee badbaadada (cf. Yoo’eel 2:32; Yooxanaa 1:12, 3:16; and iyo Rooma10:9-13). Aadanaha gaar ahaan ayaa loogu yeedhay (aayadda 2:23) inay towbad keenaan (2:38) iyo inay rumaystaan injiilka isla markaasna ay Ilaah xidhiidh shakhsi ahaaneed kula galaan Masiixa (cf. 3:16,19; 20:21; Markos 1:15). Ciise waxa uu u dhintay dunida oo dhan; qarsoodiguna waxa weeyi muxuu qof ugu jawaab celinayaa Ruuxa (Yooxanaa 6:44,65) qaarna maya (2 Korintos 4:4).

▣ **“magaca Rabbiga”** middani waxa ay tilmaamaysaa dabeecadda Ciise ama waxbarista ku saabsan Isaga. Waxa ay wadataa arrin shakhsi ahaaneed iyo mid caqido ahaaneed.

MAWDUUC GAAR AH: MAGACA RABBIGA

Tani waxay ahayd weedh uu Axdiga Cusubi si guud ahaaneed ugu adeegsanayo la jiiqista shaqsi ahaaneed iyo awooddiisa firfircoonida leh ee triune ee Ilaaha runta ah kaniisadda dhexdeeda. Maysan ahayn arrin mucjiso leh oo lala yaabo, laakiin codsi ku aaddan ahaanshaha ama dabeecadda Ilaah.

Sia badan weedhani waxa ay Ciise ku muujinaysaa in uu yahay Rabbiga ayaa ah (cf. Filiboy 2:11)

1. Qirashada uu qofka rumaysadkiisa Ciisre Masiix ku qirto maqurinta ama baabtiiska (cf. Rooma 10:9-13; Falimaha Rasuulladaq 2:39; 8:12,16; 10:48; 19:5; 22:16, I Korintos 1:13,15; Yacquub 2:7)
2. Inuu wax ku saaro ama ku bixiyo (sida jinka) (Matayos 7:22; Maarkos 9:38; Luukos 9:49; 10:17; Falimaha Rasuullada 19:13)
3. Inuu wax ku bogsiiyo (cf. Falimaha Rasuullada 3:6,16; 4:10; 9:34; Yacquub 5:14)
4. In loo adeego (cf. Matayos 10:42; 18:5; Luukos 9:48)
5. Waqtiga ay kaniisaddu samaynayso edbinta (cf. Matayos 18:15-20)
6. Marka la wacdinayo kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. Luukos 24:47; Falimaha Rasuullada 9:15; 15:17; Rooma 1:5)
7. Tukashada dhexdeeda (cf. Yooxanaa 14: 13-14; 15:2,16; 16:23; I Korintos 1:2)
8. Waddo ay Masiixiyaddu ku si gudbi karto (cf. Falimaha rasuullada 26:9’ I Korintos 1:10; II Timoteyos 2:19; Yacquub 2:7; I Butros 4:14)

Wax walboo aan ku samaynno faafiyeyaal, adeegayaal, caawiyeyaal, bogsiiyeyaal, jinni saareyaal, IWM, wax kale kuma samaynno, ee waxaannu ku dabeecaddiisa, awooddiisa, shuqulladiisa—waaweyn ee Magaciisa!

▣ **“uu badbaadi doono”** macnahan marka la eego waxa ay tilmaamaysaa badbaado ruuxi ah, halka Yoo’eel dhexdiisa ay ka sheegayso ka badbaadida jidh ahaaneed ee cadhada Ilaah (aayadda 40). Erayga “badbaaday” waxa loo adeegsaday Axdiga Hore dhexdiisa badbaadada jidh ahaaneed (cf. Matayos. 9:22; Markos 6:56; Yacquub 5:14,20). Si kastaba ha ahaatee, Axdiga Cusub dhexdiisa waxa tusaale ahaan loogu adeegsaday badbaadada ruuxi ahaaneed ama ka baadidda cadhada Ilaah (ex. Yacquub 1:21; 2:14; 4:12). Qalbiga Ilaah waxa uu u baahan yahay badbaadada dhammaanba aadanaha uu ka sameeyay ekaanshihiisa (cf. Bilowgii. 1:26-27); kaasi oo loo sameeyay is weheshi.

NASB (UPDATED) : 2:22-28

²²Rag yahow reer bini Israa’iil, hadalladan maqla: Ciisihii reer Naasaret oo ahaa nin Ilaah idiinku caddeeyey shuqullo xoog leh iyo yaabab iyo calaamooyin oo Ilaah ku sameeyey isaga gacantiisa idinka dhexdiinna. sidaad idinka qudhiinnuba u og tihiin, ²³markii isaga lagu gacan geliyey taladii Ilaah goostay oo uu hore u oгаа. gacanta sharcilaawayaasha ayaad ku qabateen, waadna ku qodobteen iskutallaabta oo disheen. ²⁴Isaga Ilaah baa sara kiciyey, oo ka furfuray xanuunkii dhimashada, maxaa yeelay, dhimashadu ma xajin karin. ²⁵Waayo, Daa’uud baa isaga ka hadlay, oo yidhi, Had iyo jeerba Rabbigaan hortayda ku arki jiray, Maxaa yeelay, midigtayduu joogaa si aan la ii dhaqaajin. ²⁶Taas aawadeed qalbigaygu waa farxay, carrabkayguna waa rayrreeyey; Weliba jidhkaygu rajuu ku nasan doonaa. ²⁷Maxaa yeelay, naftayda *Haadees kuma dayn doontid, Kaaga Qoduuska ahna uma dayn doontid inuu qudhun arko. ²⁸Waxaad i tustay jidadka nolosha, Hortaadana farxad baad iga buuxin doontaa.

2:22 “Rag yahow reer bini Israa’iil” dhegastayaashani waxa ay ahaayeen markhaatiyaal goob joog ah oo arkayay dhacdooyinkii usbuucii ugu danbeeyay ee noloshii Ciise. Waxa ay ogsoonayeen waxa uu Butros ka hadlayay. Kuwii ugu horreeyay ee kajawaab celiyay injiilkuna waxa ay ahaayeen ilaa saddex kun (aayadda 41).

▣ **“hadalladan maqla”** waa fal amar ah. is muujinta Ruuxa ayaa waxa ay soo jiidatay dareenkooda, imakana waxa imanaysa farriinta injiilka.

▣ **“Ciisihii reer Naasaret”** middani waxa weeyi “Ciisaha reer Naasaret.” Waxa haddaba suurto gal ah in ay ka hadlayso isla markaasna ay la xidhiidho magaca Masiixa, “Biqilka” (BDB 666, cf. Ishacyaah. 4:2; 6:13; 11:1,10; 14:19; 53:2; Yeremyaah. 23:5; 33:15-16; Sekeryaah. 3:8; 6:12-13). Erayga Cibraaniga ah ee “biqilna” waa *nezzer*.

MAWDUUC GAAR AH: CIISAHA NAASAREET

Waxaa jira dhawr erey oo kala duwan oo Giriig ah oo lagu isticlaay Axdiga Cusub dhexdiisa si Ciise loogu muujiyo si cad kan uu yahay.

A. Ereyada Axdiga Cusub

1. Naasareet – Magaalada ku taal Galiili (cf. Luukos 1:26; 2:4,39,51; 4:16; falimaha Rasuullada 10:38). Magaaladan laguma sheegin qoraalladii oo dhan laakiin, fariimihii dambe ayaa laga helay.
2. In Ciise uu Naasareet la yimaado wax amaan ah (cf. Yooxanaa 1:46). Calaamadda iskutallaabta Ciise ee ku jirtay meeshan magaceeda ayaa waxa ay calaamad u ahayd nacaybka Yuhuudda.
3. *Nazarēnos* - waxay sidoo kale u la xidhiidhtaa booska juquraqafi ahaaneed (cf. Luukos 4:24; 24:19).
4. *Nazōraios* - waxay u taagan tahay magaalo, sidoo kalena waa cayaar ku aaddan sida Cibraaniga uu ku yahay ereyga Masiixi “Laan” (*netzer*, cf. Ishacyaah 4:2; 11:1; 53:2; Yeremyaah 23:5; 33:15; Sakariyaah 3:8; 6:12). Luukos Ciise ayuu middan u adeegsanayaa sida ku jirta 18:37 iyo Falimaha Rasuullada 2:22; 3:6; 4:10; 6:14; 22:8; 24:5; 26:9).
5. wax la xidhiidha #3 n^o *z*ir (BDB 634), taasi oo loogala jeedo “ka wacadka loo dhaariyay.”

B. Adeegsiyadii taariikh ahaaneed ee ka baxsanaya Axdiga Cusub.

1. Waxay muujinaysaa Yuhuud (ka hor Masiixiyiinta) in ay koox dhaxaltooyo (Aramaatiga *n@sōrayya*).
2. Waxaa loo adeegsaday goobaha Yuhuudda si loo muujiyo rumaystayaasha ku jira Masiixa (cf. Falimaha Rasuullada 24:5,14; 28:22, *nosri*).
3. Wuxuu noqday ereyga tooska ah ee lagu muujiyo rumaystayaasha sida kaniisadihii Suuriya ee (Aramyga). “Masiixi” waxaa laga dhex adeegsanayey kaniisadihii Giriigta si loogu yeero rumaystayaasha.
4. Waqti ka mid ah dhiciddii Yerusaaalem, Faarisiintii ayaa waxay dib isugu abaabuleen Jamnia waxayna dejiyeen in uu jiro farqi u dhexeeya sunnaggoogga ito kaniisadda. Tusaale ka mid ah nooca inkaarta looga soo hor jeedo Masiixiyiinta ayaa laga helayaa “Siddeed iyo toban saadaalood” oo ku jira *Berakoth* 28b-29a. oo rumaystayaasha ugu yeeraya “Nazarenes” “Naasariiniyiinta.”
 “Mar qura Naasariiniyiinta iyo kuwa dhaxalku muuq beeleen; iyaga waxaa laga tirtiri doonaa buugga nolosha oo kua rumaysadka leh lagulama qori doono.”
5. Waxa adeegsaday Justin Martyr, *Dial* 126:1, kaaso adeegsaday Ishaacyaah *netzer* kiisa Ciise.

C. Aragtida qoraaga

Waxaa iga yaabiyey dhawaaqyo badan oo uu ereygu leeyahay, inkasoo aan garanayo in aan Axdigii Hore loogu maqlin sida kitaabka (Yashuuca) dhexdiisa uu dhawr dhawaaq oo kala duwan ugu leeyahay luqada Cibraaniga. Waxyaalahan soo socdaa waxa ay igu sababeen inaan hubi waayo macnaheeda saxda ah:

1. Xidhiidhka dhow ee uu la leeyahay erayada la xidhiidha Masiixa ereyga “laan” (*netzer*) ama erayga la siman *n@zir* (mid quduus ku ah ballan)
2. Xidhiidhka diidmada ah ee GaliiliMarka
3. Waa yar yahay ama maba jiro dareen ay dadkii ay isku xilliga ahaayeen ka qabeen magaalada Naasareet ee Galiili ku taalay.
4. Iyadoo kasoo baxday afkii jinniga markii uu lahaa (“Ma waxaad u timid in aad na burburiso?”)

Faahfaahin dhammays tiran oo la xidhiidha ereyadan, ka eeg Colin Brown (ed.), *The new International Dectionary of New Testament Theology*, vol. 2, bogga 346 ama Rymond E. Brown, kitaabkiisa Birth, pp. 209-213, 223-225.

▣ **“nin Ilaah idiinku caddeeyey”** Ciise waxa hubaala inuu yahay aadane human (i.e., aayadda. 23; Rooma. 1:3), sidoo kalena waa ilaah (cf. I Yooxanaa 4:1-3). Middani waa fel ebyan ah macneheeduna waa “isagoo idin tusiyay.” Ilaah waxa uu si toos ah isugu muujiyay Ciise ereyadiisa, camalladiisa, iyo qaab nololeedkiisa. Kuwan reer Yerusaaalem ahaana way arkeen oo maqleen!

▣ **“shuqullo xoog leh iyo yaabab iyo calaamooyin”** dhegastayaashani waxa ay ahaayeen kuwo ah markhaati goob joog u ah wixii Ciise uu ku sameeyay Yerusaaalem usbuucii ugu danbeeyay ee noloshiisa. Erayga “yaabab” (*teras*) waxa loogala jeedaa calaamad ama mucjiso aan caadi ahayn, hadiyo goorna ka dhacda samooyinka, sida aayadaha 19-20.

Erayga “calaamooyin” (*sēmeion*) waxa uu faa’idaynayaa dhacdo gaar ah taasi oo gudbinaysa macno ama muhiimad. Erayganina waxa uu fure ka yahay oo in badan lagu adeegsanayaa Injiilka Yooxanaa (toddoba calaamo oo gaar ah, cf. 2:1-11; 4:46-54; 5:1-18; 6:1-15,16-21; 9:1-41; 11:1-57). Calaamadaha hadiyo goor laguma arko iftiin wanaagsan (cf. Yooxanaa 2:18; 4:48; 6:2). Halkanna waxa loogu adeegsaday sidii awoodo muujin ah oo taxane ah kuwaasi oo muujinaya casriga cusub ee Ruuxu bilaabmay!

Waxa xiiso badan iyada oo Butros aanu ku dhammaysan wax wakhti ah wacdinta ugu horraysa (ugu yaraan koobitaanka ku sugan Falimaha Rasuullada 2) ee ku saabsan Ciise noloshiisii hore iyo waxbaristiisii. Dhammaystirka waxsii sheegyadii Axdiga Hore, dhimashadiisa mutadacnimada ahayd ee la sii sheegay, iyo sarakicistiisa ammaanta mudan ayaa ah wayaalaha ugu muhiimsan.

2:23 “isaga” waxa ay tani noqon kartaa duurxulka (cf. 5:28; 6:13; Luukos 23:14; Yooxanaa 9:16; 18:29), laakiinse Falimaha Rasuullada 23:9 iyo 20:31-32 maaha duurxul diidmo ah. markale ayaana waxa la adkeeyay aadananimada Ciise (aayadda 22).

▣ **“lagu gacan geliyey”** eraygan (*ekdotos*) halkan oo keliya ayaa laga helayaa Axdiga Cusub.

▣

NASB “lagu gacan geliyey taladii Ilaah goostay”

NKJV “talo lagoostay”

NRSV “qorshe hore u jiray”

TEV “Ilaah qorshihisa”

NJB “go’aanka la qorsheeyay”

Tani waa eraygan *horizō* oo ah fal ebyan ah. Macnihiisa asaasiga ahi waa goosasho, magacaabid, ama hagaajin. Axdiga Hore dhexdiisana waxa loogu adeegsaday dejinta xuduudo dhul ama doonis. Luukosna badanaa wuu adeegsanayaa (cf. Luukos 22:22; Fal 2:23; 10:42; 11:29; 17:26,31). Dhaafitaankuna layaab kumuu ahayn Ilaah, laakiinse hadiyo goorba waxay ahayd doorashadiisa (nidaamka qurbaanka ee Laawiyaantii 1-7) si uu u keeno cafiska aadanaha caasiyiinta ah (cf. Bilowgii. 3:15; Ishacyaah. 53:10; Markos 10:45; II Korintos. 5:21).

Dhimashada Ciise may ahayn shil. Waxay ahayd qorshaha Ilaah ee daa’imiska ah ee ku waajahan cafinta denbiga (cf. Luukos 22:22; Fal 3:18; 4:28; 13:29; 26:22-23). Ciise wuxuu u yimid inuu dhinto (cf. Markos. 10:45)! Iskutallaabtuna may ahayn shil!

▣ **“oo uu hore u oгаа”** tani waa erayga *prognosis* (hore wax usii ogaanshaha), waxaana lagu adeegsaday halkan oo keliya iyo Butros 1:2. Fikirkan la xidhiidha Ilaah oo ogsoon dhammaanba taariikhda aadanuhu waxay ku adagtahay waafiqtaanka doonista aadanaha ee xorta ah. Ilaah waa daa’im, mana aha mid ay wax xadaynayaan. Inkasta oo uu maamulo isla markaasna socodsiiyo taariikhda, aadanuhu waxay ka masuul yihiin ujeedooyinkooda iyo falalkooda. Hore usii ogaanshuhuna ma samaynayo jacaylka Ilaah iyo doorashadiisa. Haddii ay sidaas tahay, waxa ay shuruud ku noqonaysaa tamarta mustaqbalka ee aadanaha. Ilaah isaga ayaa awoodda oo dhan iska leh waxaanu doortay in kuwa raaca Axdigiisu ay leeyihiin xorriyadda ah inay isaga u jawaab celiyaan (cf. Rooma. 8:29; I Butros. 1:20).

Waxa jira labo waxyaalood xajiira lana xidhiidha fiqiga arrintan: (1) xorriyadda oo meel fog loo riixay: qaar ayaa waxay yidhaahdaan Ilaah muu sii ogsoonayn mustaqbalka iyo aadanaha doorashadooda (Open Theism ka oo ah fikir faylasuuf ahaaneed) iyo (2) awooddii oo lasii fogaayay, taasi oo ah in Ilaah dadka qaarna u dooranayo inay jano galaan qaarna cadaab (labo casriilayaasha Kalfaniska). Waxa aan door bidayaa Sabuurka 139.

▣ **“idinku”** Butros waxa uu sheegayaa dhegaystayaasha reer Yerusaaalem denbiga la xidhiidha dhimashada Ciise (cf. 3:13-15; 4:10; 5:30; 10:39; 13:27,28). Iyagu kamay mid ahayn kuwii ku baaqay iskutallaab ku qodbitaankiisa; sidoo kalena kamay mid ahayn guddidii Senhadriinka ee isaga u keenay Bilaatos; sidoo kalena may ahayn saraakiishii ama askartii Roomaanka ee isaga isku tallaabta ku qodbay, laakiinse haddana masuul bay ka yihiin sida inaguba aan masuulka uuga nahay. Denbiga aadanaha iyo caasinimada ayaa kallifay inuu dhinto!

▣ **“waadna ku qodobteen iskutallaabta”** macno ahaan waxa weeyi “ku dhejin” (*prospēgnumi*). Halkan oo keliya ayaa Axdiga Cusub lagaga sheegay waxaanay tusinaysaa musbaaritaan iyo ku xidhitaanka iskutallaabta. Sida ku sugan 5:30 ayaa middan oo kale waxa lagu sheegay “ku xidhista geed.” Hoggaamiyayaasha Yuhuuddu may rabin Ciise in dhagax lagu dilo sidii Stefanoos markii danbe oo kale (Fal 7), laakiinse waxay dooneen in iskutallaabta lagu qodbo (Louw iyo Nida ayaa sheegaya in *hapaxlegomenon* ni ay la mid tahay *stauro*, iskutallaab ku qobid, [p. 237 sharraxaadda 9]). Tanina waxa ay la xidhiidhaysa habaarka Sharciga Kunoqoshadiisa 21:23. Asal ahaan habaarkani waxa uu la xidhiidhay wax ka dhaca fagaare, laakiin maalmihii Ciise rabbiyiintu waxay la xidhiidhiyeen arrinta iskutallaab ku qodbista. Ciise waxa uu inkaartii sharciga ee Axdiga Hore ka kor qaaday dhammaanba rumaystayaasha (cf. Galaatiya. 3:13; Kolosay. 2:14).

▣ **“sharcilaawayaasha”** macno ahaan waa “dadka sharcilaawayaasha ah waxaanay tilmaamaysaa Roomaanka.

2:24 “Isaga Ilaah baa sara kiciyey” Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa in saddexda shakhsi ee Saddexmidnimadu ay shaqaynaayeen sarakictii Ciise dhexdeeda:

1. Ruuxa (cf. Rooma. 8:11)
2. Wiilka (cf. Yooxanaa 2:19-22; 10:17-18)
3. iyo Aabbaha (cf. Fal 2:24,32; 3:15,26; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30,33,34,37; 17:31; Rooma. 6:4,9)

Falalka Aabbuhu waxay ahaayeen ansixinta aqbalitaankiisa nolosha Ciise, dhimashadiisa, iyo waxbaristiisa. Tanina waxa ay ahayd dhinac muhiim u ah wacdintii Rasuulladii hore. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14.

▣ **“oo ka furfuray xanuunkii dhimashada,”** ereyadan waxa loogala jeedi karaa (1) xanuunada dhalashada (Giriigga Qadiimiga ah, cf. Rooma. 8:22) (2) shabihitaanka dhibaatooyinka ka horreeya Imaatinka Labaad (cf. Matayos. 24:8; Markos 13:8; I Tesaloniika. 5:3). Waxa suurto gal ah in tilmaamayso erayada Cibraaniga ah “snare” ama “noose” sida ku sugan Sabuurka 18:4-5 iyo 116:3, kuwaasi oo lagu shabahayay xukunka Axdiga Hore (cf. Ishacyaah. 13:6-8; Yeremyaah. 4:31).

▣ **“maxaa yeelay, dhimashadu ma xajin karin.”** Yooxanaa 20:9 ayaa sidoo kale sarakicista Ciise la xidhiidhinaysa waxsii sheegista Axdiga Hore (aayadaha 25-28). Ciise waxa uu Haades u tegay ujeedo (cf. I Butros. 3:19; 4:6). Markii uu tegay waxa uu kaxaystay rumaystayaasha xaqa ah (I Korintos 5:6,8)!

2:25 “Waayo, Daa'uud baa isaga ka hadlay” waa xigasho ka ahaatay Sabuurka. 16:8-11. Butros waxa uu sheegayaa in Sabuurka 16 uu yahay mid ku saabsan Masiixa (sida Bawlos ku samaynayo 13:36; kuwanina waa labada xigasho ee Sabuurka 16 Axdiga Cusub dhexdiisa) waxaanay si toos ah u sheegaysaa Ciise. Sarakicista Ciise waxa weeyi rajada Sabuuraystaha iyo rumaystayaasha Axdiga Cusub.

2:26 “rajo” eraygan laguma dhex adeegsan Injiillada dhexdooda, laakiinse waxa lagu adeegsaday Falimaha Rasuullada iyadoo la tilmaamayo rumaystayaasha rumaysadkooda mustaqbalka iyo waxyaalaha uu injiilku ballan qaadayo (cf. 23:6; 24:15; 26:6,7; 28:20). Waxa badanaa lagu adeegsaday qoraallada Bawlos, laakiin macnoyaal dhowr ah ayaa la xidhiidha qorshaha cafiska daa'imiska ah ee Ilaah. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: RAJADA

Bawlos marar badan ayuu ereygan adeegsaday laakiin jumlado wada socda ayey ahaayeen. Sida badan waxay la xiriirtay in qofka iimaankiisu uusan ka shakiyin ama ka hallaabin ee uu kaamilmo. (tusaale ahaan. I Timoteyos 1:1). Tan waxaa sidoo kale lagu sharrixi karaa ammaan, nolosha weligeed ah, badbaadada ugu dambaysa, Imaanshada labaad, IWM. Kaamilnimadu waa wax dhab ah, laakiin waqti la adeegsano waa mustaqbal oo lama oga. Had iyo jeer waxay la soo socotay “iimaan iyo “jacayl” (cf. I Korintos 13:13; I Tesaloniika 1:3; II Tesaloniika 2:16). qaar ka mid kuwii Bawlos isticmaalay waxaa ka mid ah:

1. Imaashada labaad, Galatiya 5:5; Efesos 1:18; 4:4; Titos 2:13
2. Ciise waa rajadeenna I Timoteyos 1:1
3. In kan rumaysaka lahu isu dhiibo Ilaah, Kolosay 1:22-23; I tesaloniika 2:19
4. Rajadu waxa ay dhex taallaa jannada, Kolosay 1: 15
5. Rume Injiilka, Kolosay 1:23; I Tesaloniika 2:19
6. Badbaadada ugu dambaynta ah, Kolosay 1:5; I Tesaloniika 4:13; 5:8
7. Ammaanta Ilaah, Rooma 5:2. II Korintos 3:12; Kolosay 1:27
8. Badbaadadii aan dadka yuhuuda ahayn ku badbaadeen Masiixa, Kolosay 1:27
9. Hubsashada badbaadada, I Tesaloniika 5:8
10. Nolosha weligeed ah, Titos 1:2; 3:7
11. Natiijooyinka qaan gaadhnimada Masiixiga, Rooma 5:2-5
12. Soo Furashadii uunka oo dhan, Rooma 8:20-22
13. Kaamilnimadii carruurnoqoshada, Rooma 8:23-25
14. Magacaabashada ama talo saarashada Ilaah, 15:13
15. Rabitaankii Bawlos u qabay rumaystayaasha, II Korintos 1:7
16. Axdigii Hore wuxuu hage tusaale u yahay rumaystayaasha Axdiga Cusub, Rooma 15:4

2:27 “Haadees” tani waa eray Giriig ah oo loo adeegsado meesha haysa dadka dhintay. Waxa ay la mid tahay Erayga Cibraaniga ah ee *Sheol* Axdiga Hore dhexdiisa. Axdiga Hore dhexdiisa nolosha dabadeed waxa loo sheegay iyadoo ah jiritaan uu qofku dareemayo qoyskiisa, laakiinse ma jirto farxad iyo is wehesho. Haddaba muujinta Axdiga Cusub ayaa si cad u sheegtay nolosha dabadeed (janada iyo cadaabta).

MAWDUUC GAAR AH: XAGAY JIRAAN KUWII DHINTAY?

I. Axdiga Hore

A. Dadka oo dhammi waxay tegayaan *Sheol* (aan la hubin, BDB 1066), waana si loo tilmaamo dadka oo dhan oo dhimanaya xabaalna galaya, badanaana waxa loogu adeegsaday Suugaanta Xikmadda iyo Ishacyaah. Axdiga Hore dhexdiisa waxay ahayd waxaan caddayn, laakiinse ah jiritaan (Ayuub 10:21-22; 38:17; Sabuurka 107:10,14).

B. Qaabka *Sheol*

1. wax la xidhiidha xukunka Ilaah, Sharciga Kunoqoshadiisa 32:22
2. wax la xidhiidha ciqaabka ka horreeya maalintaa Qiyaamaha, Sabuurka 18:4-5
3. wax la xidhiidha Burburka Ilaah wax ku ciqaabo, Ayuub 26:6; Sabuurka 139:8; Caamoos 9:2
4. wax la xidhiidha xabaasha, Sabuurka 16:10; Ishacyaah 14:15; Yexesqeel 31:15-17
5. ku dhaadhicida *Sheol* iyadoo la nool yahay, Tirintii 16:30,33; Sabuurka 55:15
6. waxa lagu tilmaamay xayawaan leh af wayn, Tirintii 16:30; Ishacyaah 5:14; 14:9; Xabquuq 2:5
7. dadka halkaas waxa lagu magacabaay *Repha'im*, Ishacyaah 14:9-11

II. Axdiga Cusub

A. Erayga Cibraaniga ah ee *Sheol* waxa Giriigga loogu tarjumay *Hades* (dunida aan la arkayn)

B. Hades waxa qaabkeedu ahaa

1. tilmaamista dhimashada, Matayos 16:18
2. wax la xidhiidha dhimashada, Muujintii 1:18; 6:8; 20:13-14
3. waxa ay la mid tahay meel wax lagu ciqaabo (*Gehenna*), Matayos 11:23 (xigaho Axdiga Hore); Luukos 10:15; 16:23-24
4. waxay la mid tahay xabaasha, Luukos 16:23

C. waxa suurto gala in la qaybiyay (rabbaaniyiinta)

1. qayb wanaagsan oo ah janada (2 Korintos 12:4; Muujintii 2:7), Luukos 23:43
2. qayb xun oo loogu magac daray cadaab, 2 Butros 2:4, oo ah meel lagu tuuray malaa'igta sharka ah (Bilowgii 6; 1 Enoch)

D. *Gehema*

1. waxay ka tarjumaysaa erayo Axdiga Hore ah, “toggii wiilasha Hinnom” (koonfurta Yerusaaalem). Waxay ahayd meeshii ilaaha cadaabta ee Foyiniinta, *Molech* (BDB 574), waxaana lagu caabudi jiray qurbaan ilmo ah (2 Boqorradii 16:3; 21:6; 2 Korintos 28:3; 33:6), waxaana lagu mamnuucay Laawiyiintii 18:21; 20:2-5.
2. Yermiyaah ayaa ka bedelay meel jaahilmimada lagu caabudo waxaanu ka dhigay goobta xukunka YHWH (Yeremyaah 7:32; 19:6-7). Waxay noqotay meesha cadaabta ee xukunka abidka ah sida ku sugan 1 Enoch 90:26-27 iyo Sib 1:103.
3. Yuhuuddii noolaa maalimihii Ciise waxa ay ka walaacsanaayeen awowyaashood oo ka qayb qaatay jaahiliyaddaas ilmaha qurbaan ahaanta loogu bixin jiray, waxaanay meesha ka dhigeen meel qashinka Yerusaaalem lagu guro. Kuwo badan oo ka mid ahaa tusaalayaasha Ciise ee la xidhiidhi xukunka daa'imka ahina dhulkan ayay ku saabsanaayeen (dab, qiiq, dirxiyo, Markos 9:44,46). Erayga *Gehenna* waxa kelidiis adeegsaday Ciise (marka laga reebo Yacquub 3:6).
4. Adeegsiga Ciise ee *Gehenna*
 - a. dab, Matayos 5:22; 18:9; Markos 9:43
 - b. negaansho, Markos 9:48 (Matayos 25:46)
 - c. meel burbur (nafta iyo jidhkaba), Matayos 10:28
 - d. la mida *Sheol*, Matayos 5:29-30; 18:9.
 - e. waxa lagu tilmaamay xumaan “wiilka cadaabta” Matayos 23:15

- f. natiijo xukun, Matayos 23:33; Luukos 12:5
- g. fikirta *Gehenna* wuxuu la mid yahay dhimashada labaad (Muujintii 2:11; 20:6,14) ama warta dabka (Matayos 13:42,50; Muujintii 19:20; 20:10,14-15; 21:8). Waxa suurto gala warta dabku inay noqoto meel ay galaan dadka iyo malaa'igaha sharka lihi (cadaabta, 2 Butros 3:4; Yuudas aayadda 6 ama Luukos 8:31; Muujintii 9:1-11; 20:1,3).
- h. looguma tala galin aadanaha, laakiin waxa loogu talo galay shaydaanka iyo malaa'igihisa, Matayos 25:41

- E. waxa suurto gala in maadaama oo qayb ahaan laga sheegay *Sheol, Hades, iyo Gehenna* in
 - 1. asal ahaan aadanaha oo dhami tegeen *Sheol/Hades*
 - 2. khibradda halkaasi waxa xumaanaysaa qiyaamaha dabadiis, laakiinse meesha xumaanta sideeda ayay ahaanaysaa (waana sababta KJV uu *hades*(xabaal) ugu tarjumay *gehenna*(cadaab).
 - 3. Meesha keliya ee Axdiga Cusub dhexdiisa laga sheegay xanuunka ka horreeya qiyaamuhu waxa weeyi masaalka Luukos 16:19-31 (Laasaros iyo ninkii hodanka ahaa). *sheol* sidoo kale waxa lagu sheegay meel ah ciqaabka imika (Sharciga Kunoqoshadiisa 32:22; Sabuurka 18:1-5). Si kastabana ha ahaatee, qofna masaal kuma asaasi karo caqiido.

III. Waxa u dhexeeya dhimashada iyo sarakicista

- A. Axdiga Cusubi ma barayo “waaritaanka nafta” kaasi oo ahaa aragtiyihii dadkii hore ka aaminsanaayeen nolosha dabadeed.
 - 1. Aadanaha naftooda waxay jirtaa ka hor noloshooda jidh ahaaneed
 - 2. Aadanaha noloshooda waa daa'im ka hor iyo kaddib dhimashada jidh ahaaneed.
 - 3. Hadiyo goor jidkhka waxa loo arkaa xabsi iyadoo dhimashaduna tahay dib ugu noqoshada jiritaankii hore
- B. Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa xaalad rooxaan ahaaneed oo u dhaxaysa dhimashada iyo sarakicista
 - 1. Ciise wuxuu ka hadlayaa kala qaybsanaanta jidhka iyo nafta, Matayos 10:28
 - 2. Ibraahim waxa laga yaabaa inuu imika haysto jidh, Markos 12:26-27; Luukos 16:23
 - 3. Muuse iyo Eliyaas waxay lahaayeen jidh markii is beddelka, Matayos 17
 - 4. Bawlos wuxuu sheegayaa Imaatinka Labaad in nafaha la jira Masiixu ay ugu horrayn heli doonaan jidh cusub, 1 Tesaloniika 4:13-18
 - 5. Bawlos wuxuu sheegayaa in rumaystayaasha heli doonaan jidhkooda ruuxiga ah Maalinta Qiyaamaha, 1 Korintos 15:23,52
 - 6. Bawlos wuxuu sheegayaa in rumaystayaashu aanay gali doonin *Hades*, laakiinse dhimashadaba ay kula joogaan Ciise, 2 Korintos 5:6,8; Filiboy 1:23. Ciise wuxuu ka adkaaday dhimashada iyadoo kuwa xaqa ahna uu u qaaday janada, 1 Butros 3:18-22.

IV. Jano

- A. Eraygan saddex macne ayaa loogu dhex adeegsaday Kitaabka
 - 1. Hawada ka sarraysa dhulka, Bilowgii 1:1,8; Ishacyaah 42:5; 45:18
 - 2. Iftiinnada samada, Bilowgii 1:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 10:14; Sabuurka 148:4; Cibraaniyada 4:14; 7:26
 - 3. Samooyinka Ilaah, Sharciga Kunoqoshadiisa 10:14; 1 Boqorradii 8:27; Sabuurka 148:4; Efesos 4:10; Cibraaniyada 9:24 (samo saddexaad, 2 Korintos 12:2)
- B. Kitaabku muu muujinin wax ku saabsan nolosh dabadeed, maxaa yeelay aadanaha leexday ma awoodi karaan inay fahmaan (1 Korintos 2:9).
- C. Janadu waxay isugu jirtaa meel (Yooxanaa 14:2-3) iyo shakhsi (2 Korintos 5:6,8). Janadu waxay noqon kartaa Beer Ceeden oo dib loo soo celiyo (Bilowgii 1-2; Muujintii 21-22). Dhulka waa la nadiifin doonaa oo la hagaajin doonaa (Falimaha Rasuullada 3:21; Rooma 8:21; 2 Butros 3:10). Ekaanshaha Ilaah (Bilowgii 1:26-27) waxa lagusoo celiyay Masiixa dhexdiisa. Iminkana weheshigii Beer Ceeden markale ayuu suurto gal yahay.

Si kastaba ha ahaatee, middani waxay noqon kartaa tusaale ahaan (janada wayn ee Muujintii 21:9-27) mana aha xaqiiqo. 1 Korintos 15 ayaa ku sheegaya farqiga u dhexeeya jidka la taaban karo iyo jidhka ruuxiga ah sida iniinyaha geed qaan gaadh ah oo kale. markalena, 1 Korintos 2:9 (lagasoo xigtay Ishacyaah 64:4 iyo 65:17) waa ballan qaad iyo rajo

wayn! Waxaan ogahay marka aan isaga aragnona inaan sidiisa oo kale noqon doono (1 Yooxanaa 3:2).

V. Maraajic wanaagsan

A. William Hendriksen, kitaabkiisa *The Bible On the Life Hereafter*

B. Maurice Rawlings, kitaabkiisa *Beyond Death's Door*

▣ **“Kaaga Qoduuska ahna uma dayn doontid inuu qudhun arko”** middani waxay ahayd arrin muuqata oo la xidhiidha Masiixa dhimashiisa, laakiinse maaha tirtiritaanka Kan La ballan qaaday, Kan la doortay, Kan Quduuska ah cf. Sabuurka. 49:15 iyo 86:13).

2:28 “Hortaadana farxad baad iga buuxin doontaa” erayadani waxa ay tusinayaan farxad shakhsi ahaaneed ee la jiritaanka Aabbaha (aayadaha 22-28) samada dhexdeeda taasi oo ku imanaysa dhimashada Masiixa (cf. Ishacyaah. 53:10-12). Aragtidan wanaagsan ee ah weheshiga shakhsi ahaaneed ee lala yeelanayo Ilaah noloshada dabadeed waxa ay ku diiwaan gashantahay Ayuub 14:14-15; 19:25-27.

NASB (UPDATED) TEXT: 2:29-36

²⁹Walaalayaalow, waxaan si bayaan ah idiinku sheegi karaa in awowe Daa'uud dhintay, lana aasay, xabaashiisuna ilaa maanta waa inagu dhex taal. ³⁰Haddaba isagoo nebi ahaa oo ogaa in Ilaah dhaar ugu dhaartay isaga inuu dhashiisa midkood carshigiisa ku fadhiisiin doono, ³¹Wuxuu hore u arkay oo ka hadlay Masiixa sarakiciddiisa inaan isaga Haadees lagu dayn, jidhkiisuna qudhun arag. ³²Ciisahan Ilaah baa sara kiciyey, annagoo dhammuna markhaatiyaal baan ka wada nahay. ³³Haddaba isagoo Ilaah midigtiisa sare loogu qaaday, oo Aabbaha ka helay ballankii Ruuxa Qoduuska ahaa, ayuu soo shubay waxan oo aad arkaysaan oo maqlaysaan. ³⁴Maxaa yeelay, Daa'uud samooyinka kor uma aadin: laakiin isaga qudhiisaa leh, Rabbigu wuxuu Sayidkayga ku yidhi, Midigtayda fadhiiso ³⁵Ilaa aan cadaawayaashaada cagahaaga hoostooda geliyo. ³⁶Reer bini Israa'iil oo dhammu aad ha u ogaadeen in Ilaah ka dhigay Rabbi iyo Masiixba Ciisahan aad iskutallaabta ku qodobteen.

2:29-31 uuma fududa akhristayaasha casriga ah ee reer galbeedka in ay raacaan sida Butros u sharraxayo Sabuurkan maxaa yeelay waxa uu adeegsanayaa fahanka rabbaaniyiinta (sidoo kale waxa la mida kitaabka Cibraaniyada). Butros waxa laga yaabaa inuu doodan imaatinka Masiixa ka maqlay sinagooga iminkana wuxuu ogssoon yahay inay tilmaamayso Ciisihii reer Naaseret.

2:29 Butros waxa uu tusinayaa in Sabuurka 16 inkastoo siyaabaha qaar uu u sheegayo Daa'uud (gaar ahaan 16:10b), in si buuxda aanay u sheegi karin Daa'uud.

2:30 “isagoo nebi ahaa” Yuhuuddu waxa ay rumaysnayeen in Ilaah uu ka dhex hadlo nebiyada. Muuse waxa lagu magacaabay nebi (Sharciga Kunoqoshiisa 18:18). Kitaabada Axdiga Hore ee Yashuuca, Xaakinnadii, 1 iyo 2 Samuu'eel, iyo 1 iyo 2 Boqorradii waxa loo yaqaanay qoraallada Yuhuudda “nebiyadii hore.” Kaddib dhimashada nebigii ugu danbeeyay ee ahaa Malaakii, rabbaaniyuuntu waxay kasoo qaadeen in waxygii uu joogsaday. Fahankan ama macnaha Yuhuudda ayaana eragan Daa'uud uugu tix geliyay nebi ahaan. Bilowga Axdiga Hore dhexdiisa ayaa Ilaah waxa uu ugu muujiyay Muuse (Bilowgii 49) in Masiixu uu ka ahaan doono qabiilka Yahuuda. Sida ku sugan 2 Samuu'eel 7 Ilaah waxa uu muujiyay inuu ka ahaan doono laynka boqortooyada ee Daa'uud. Sabuurka 110 ayaa sidoo kale Ilaah waxa uu ku muujiyay inuu Masiixu ka ahaan doono laynka wadaaddada ee Melkisaadeq (aayadaha 34-35).

▣ **“Ilaah dhaar ugu dhaartay isaga inuu dhashiisa midkood carshigiisa ku fadhiisiin doono”** waxa middani ay soo koobitaan u tahay 2 Samuu'eel 7:11-16; Ps. 89:3-4; or 132:11. Waxa middani ay tusinaysaa in Ilaah ujeeddadiisa hore ahyad inuu Ciisihii reer Naaseret ku dhammays tiri doono. dhimashiisa iyo sarakicistiisu may ahayn qorshaha labaad, laakiin waxa ay ahayd qorshahaha Ilaah ee ugu horrayntiiba loogu talo galay badbaadada xitaa abuurka hortii (cf. Efesos. 2:11- 3:13).

2:31 “Masiixa” tani waa tarjumaadda Giriigga ee “Messiah” ama macno ahaan “ka la doortay.” Ciise oo keli ahi muu ahayn wiilka Daa’uud, oo ah Boqorka Israa’iil, laakiin Wiilka Ilaah weeyi oo fadhiistay carshiga samada (Sabuurka 110).

MAWDUUC GAAR AH: MASIIX

Waxa laga soo qaatay fiirada tafsiiirkayga Daanyeel 9:6. Dhibaataada ka imanaysa fasiraadda eraygan ayaa ah iyada oo macnayaal kale oo suurto gal ah lala xidhiidhin karo (BDB 603).

1. Waxa loo adeegsaday boqorka Yuhuudda (1 Samuu’eel 2:10; 12:3)
2. Waxa loo adeegsaday wadaaddada Yuhuudda (Laawiyyintii 4:3,5)
3. Waxa loo adeegsaday Kuuros (Ishacyaah 45:1)
4. #1 iyo #2 waxa lagu xidhiidhiyay Sabuurka 110 iyo Sekaryaah 4
5. Waxa loo adeegsaday imaatinka Ilaah ee gaarka ah, Boqortooyada Daa’uud ee ay ka imanayso casri cusub ee xaqnimada
 - a. Farcanka Yahuudah (Bilowgii 49:10)
 - b. Gurigii Yese (2 Samuu’eel 7)
 - c. Xukunka caalamiga ah (Sabuurka 2; Ishacyaah 9:6; 11:1-5; Miikaah 5:1-4ff)

Aniga shakhsi ahaan waxa isoo jiiday magaca Ciisah reer Naasereet lagu magacaabay ee ah “kan la doortay” sababtuna waa

1. Hordhaca boqortooyada waaraysa ee cutubka 2 ilaa boqortooyadii afraad
2. Hordhaca “wiilka aadanaha” ee 7:13 oo la siiyay boqortooyo waaraysa
3. Erayada badbaadada ee 9:24, oo tilmaamaysa dhammaystirka taariikhda leexashada ee aadanaha
4. Ciise adeegsigiisii uu kitaabka Daanyeel ku dhex adeegsaday Axdiga Cusub (Matayos 24:15; Markos 13:14).

▣ **“inaan isaga Haadees lagu dayn, jidhkiisuna qudhun arag”** NASB (updated) ka middan laguma calaamadinin iyadoo ah xigasho ka ahaatay Axdiga Hore. Waxa ay tilmaamaysaa Sabuurka 16. Wax ku saabsan “jidh” ka eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: JIDH (*sarx*)

Eraygan waxa badanaa adeegsaday Bawlos isagoo ku dhex adeegsaday Galatiya iyo fiqiga Rooma. Culimadu waxa ya kala qaabeeyaan waxyaalaha kala duwan ee la xidhiidha eraygan, waxaana jira macno dahsoon oo ay leedahay. Waxyaalahan soo socda ayaa loogu fiirsan karaa eraygan iyo qaabkiisa loogu adeegsado xagga samatiga:

- A. jidhka aadanaha, Yooxanaa 1:14; Rooma. 2:28; I Korintos. 5:5; 7:28; II Korintos. 4:11; 7:5; 12:7; Galatiya. 1:16; 2:16,20; 4:13; Filiboy. 1:22; Kolosay. 1:22,24; 2:5; I Timoteyos. 3:16
- B. heerka aadanaha, Yooxanaa 3:6; Rooma. 1:3; 4:1; 9:3,5,8; 11:14; I Korintos. 10:18; Galatiya. 4:23,29
- C. shakhsiyadda aadanaha, Rooma . 3:20; 7:5; 8:7-8; I Korintos. 1:29; II Korintos. 10:3; Galatiya. 2:16; 5:24
- D. hadalka aadanaha , Yooxanaa 8:15; I Korintos. 1:26; II Korintos. 1:12; 5:16; 10:2; Galatiya. 6:12
- E. taag darrada aadanaha , Rooma . 6:19; 7:18; 8:5-6,9; II Korintos. 10:4; Galatiya. 3:3; 5:13,16,19-21; Kolosay. 2:18
- F. aadanaha oo kasoo horjeestay Ilaah, wax la xidhiidha cidhibta leexashada, Rooma. 7:14; 13:14; I Korintos. 3:1,3; Efesos. 2:3; Kolosay. 2:18; I Butros. 2:11; I Yooxanaa 2:16.

2:32-33 “Ciise...Ilaah...Ruuxa” inkasta oo erayga “saddexmidnimo” aan weligeed lagu adeegsan Kitaabka dhexdiisa, haddana fikirka Ilaah isku muujiyay saddexmidnimadu waxa uu rabaa (1) ilaahnimada Ciise iyo (2) shakhsiyadda Ruuxa. Kitaabku isaga oo saddexda shakhsiyood isla xidhiidhinaya ayuu Saddexmidnimada ku

tilmaamayaa macne keli ah (cf. Fal 2:32-33; Matayos. 28:19; I Korintos. 12:4-6; II Korintos. 1:21-22; 13:14; Efesos. 4:4-6 iyo I Butros. 1:2)

MAWDUUC GAAR AH: SADDEX MIDNIMADA

Waa in aad xusuusnaataa dhammaan wax qabadyada saddexda shaqsi ee saddex midnimada. Ereyga “Saddex midnimdo,” waxaa asal ahan laga soo qaatay Tertulian, Laakiin ma aha erey Kitaabka Qudduuska ah ku jira, ujeedkuse waa pervasive

- A. Injiilka
 - 1. Matayos 3:16-17; 28:19 (iyo kuwa la socda)
 - 2. Yooxanaa 14:26
- B. Falimaha Rasuullada – Falimaha Rasuullada 2:32-33,38-39
- C. Bawlos
 - 1. Rooma 1:4-5; 5:1,5; 8:1-4,8-10
 - 2. I Korintos 1:8-10; 12:4-6
 - 3. II Korintos 1:21; 13:14
 - 4. Galatiya 4:4-6
 - 5. Efesos 1:3-14,17; 2:18; 3: 14-17; 4:4-6
 - 6. I Tesaloniika 1:2-5
 - 7. II Tesaloniika 2:13
 - 8. Tiitos 3:4-6
- D. Butros – I Butros 1:2
- E. Yuudas – aaydaha 20-21

Tani sidoo kale way ku sharraxan tahay Axdigii Hore

- A. Ereyada sida jamaca ah Ilaah loogu magacaabo
 - 1. Magaca *Elohim* waa jamac ama plural, laakiin marka Ilaah loo adeegsanayo waa erey keligii ah oo aan wax badan tilmaamayn
 - 2. “Annaga” waxa ay ku jirtaa Bilowgii 1:26-27; 3:22; 117
- B. Malaa’igta Rabbigu waxa ay ahayd wakiil loo jeedo u ahayd Ilaah
 - 1. Bilowgii 16:7-13; 22:11-15; 31:11,13; 48:15-16
 - 2. Baxniintii 3:2,4; 13:21; 14:19
 - 3. Xaakinnadii 2:1; 6:22-23; 13:3-22
 - 4. Sakariyaah 3:1-2
- C. Ilaah iyo Ruuxu way kala soocan yihiin, Bilowgii 1:1-2; Sabuurrada 104:30; Ishacyaah 63:9-11; Yexesqeel 37:13-14
- D. Ilaah (YHWH) iyo Masiixa (*Adon*) way kala soocan yihiin, Sabuurrada 45:6-7; 1101; Sakariyaah 2:8-11; 10:9-12
- E. Masiix iyo Ruuxu waa kala soocan yihiin, Sakariyaah 12:10
- F. Dhammaan saddexdaba waxaa lagu sharraxay Ishacyaah 48:16; 61:1

Ilaahnimada Ciise iyo shaqsi ahaanshaha Ruuxu waxay dhibaatooyin ku keeneen hab sami u socodkii, monotheistic, rumaystayaashii ugu horreeyay:

- 1. Tertulian—Sida Wiilku iga hooseeyo Aabbaha
- 2. Origen—kala hoosaynta nolosha Ilaahiyanka ah ee Wiilka iyo Ruuxa.
- 3. Arius—Diidista Ilaahnimada Wiilka iyo Ruuxa
- 4. Monarchianism- Ilaah oo jiritaankiisa si adag loo rumaysto

Saddex midnimadu waa hab si taariiq ahaaneed loo soo arkay oo horumar u sameeyay oo lagu arkay waxa uu Kitaabka Qudduuska ahu ka kooban yahay

- 1. Ilaahnimada buuxda ee Ciise, oo la mid ah Aabbaha, waxaa caddeeyay golihii Nicca 325 A. D.
- 2. Shaqsiyadda kaamilka ah iyo Ilaahnimada Ruuxa oo la mid ah aabbaha iyo Wiilka waxaa qeexay golihii Constantinople (381 A. D.)
- 3. Madhabta saddex midnimada waxaa si buuxda loogu qeexay Augustine shaqadiisii, *de Trinitate*

Sida runta ah waxaa halkan yaal yaabab run ah. Laakiin Axdiga Cusub wuxuu adkaynayaa hal jiritaan oo weyn oo kala ah saddex shaqsi oo weligood muuqaal shaqsi ahaaneed lahaa.

2:32 “Ciisahan Ilaah baa sara kiciyey” eeg fiirada 2:24.

▣ **“annagoo dhammuna markhaatiyaal baan ka wada nahay”** middani waxa ay tilmaamaysaa kuwii arkay Masiixa oo la sarakiciyay. Eeg jadwalka muuqashooyinkii sarakicista kaddib sida uu dhigayo Paul Barnett, *Jesus and the Rise of Early Christianity*, p. 185, at 1:3 (p. 9).

2:33 “Ilaah midigtiisa” waxa weeyi tusaale ama shabbaahaad kale oo tusinaysa heerka awoodda ay leedahay sare u qaadistu (1 Yooxanaa 2:1), taasi oo lagasoo qaatay Sabuurka 110:1 (Axdiga Cusub dhexdiisa si ka badan Sabuurrada kale ayaa loogusoo xigtay) ama Sabuurka 118:16. Ilaah waa mid Ruuxiisu abid yahay, oo dhex jooga makhluuqaadka rooxaanta ama jidhka ah. aadanahuna waxay adeegsadaan luqad iyo fahan ay isaga kula hadli karaan, laakiin dhammaantood waa (1) wadahaadallo (2) isu ekaysiin ama (3) shabahaad ama tusaalayn. Xitaa erayga “Aabbe” waxa lagu sheegaa Ilaah ama “Wiil” waxa lagu tilmaamaa Ciise waana tusaalayn. Dhammaanba tusaalayntuna waxay isugu timaaddaa meel qudha. Waxa ujeedoodu tahay inay gudbiyaan xaqiiqo ama fikir ku saabsan ilaahnimada. Ka taxadir macnaha arrintanna! Hubaashii ma filan doontid inaad aragto oday gaboobay, nin da’ yar oo kursi ku fadhiga iyo shimbiro cadcad oo duulaya markaad gasho jannada. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: ILAAH OO LOO TILMAAMAY SIDA AADANAHA

I. Luqada noocan ahi waxay caan ku tahay Axdiga Hore

A. Qaybaha jidhka

1. indhaha – Bilowgii 1:4,31; 6:8; Baxniintii 33:17; Tirintii 14:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 11:12; Sekaryaah 4:10
2. gacmaha – Baxniintii 15:17; Tirintii 11:23; Sharciga Kunoqoshadiisa 2:15
3. gacan – Baxniintii 6:6; 15:16; Tirintii 11:23; Sharciga Kunoqoshadiisa 4:34; 5:15
4. dhegaha – Tirintii 11:18; 1 Samuu’eel 8:21; 2 Boqorradii 19:16; Sabuurka 5:1; 10:17; 18:6
5. weji – Baxniintii 32:30; 33:11; Tirintii 6:25; Sharciga Kunoqoshadiisa 34:10; Sabuurka 114:7
6. far – Baxniintii 8:19; 31:18; Sharciga Kunoqoshadiisa 9:10; Sabuurka 8:3
7. cod – Bilowgii 3:8,10; Baxniintii 15:26; 19:19; Sharciga Kunoqoshadiisa 26:17; 27:10
8. lug – Baxniintii 24:10; Yexesqeel 43:7
9. qaabka aadanaha – Baxniintii 24:9-11; Sabuurka 47; Ishacyaah 6:1; Yexesqeel 1:26
10. Malaga Rabbiga – Bilowgii 16:7-13; 22:11-15; 31:11,14; 48:15-16; Baxniintii 3:4,13-21; 14:19; Xaakinnadii 2:1; 6:22-23; 13:3-22

B. falalka jidh ahaaneed

1. hadalka oo samaynaya abuurka – Bilowgii 1:3,6,9,11,14,20,24,26
2. socodka beer Ceeden dhexdeeda – Bilowgii 3:8; 18:33; Xabquuq 3:15
3. xidhitaanka albaabka doonnidii Nuux – Bilowgii 7:16
4. urinta allabbariga – Bilowgii 8:21; Laawiyiintii 26:31; Caamoos 5:21
5. soo daadegista – Bilowgii 11:5; 18:21; Baxniintii 3:8; 19:11,18,20
6. aasiddii Muuse – Sharciga Kunoqoshadiisa 34:6

C. caadifadaha aadanaha

1. towbad keen – Bilowgii 6:6,7; Baxniintii 32:14; Xaakinnadii 2:18; 1 Samuu’eel 15:29,35; Caamoos 7:3,6
2. cadho – Baxniintii 4:14; 15:7; Tirintii 11:10; 12:9; 22:22; 25:3,4; 32:10,13,14; Sharciga Kunoqoshadiisa 6:5; 7:4; 29:20
3. hinaasenimada – Baxniintii 20:5; 34:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 4:24; 5:9; 6:15; 32:16,21; Yashuuca 24:19
4. nacayb – Laawiyiintii 2:23; 26:30; Sharciga Kunoqoshadiisa 32:19

D. erayada qoyska (tusaalayaal ka mida)

1. Aabbaha
 - a. Israa’iil – Baxniintii 4:22; Sharciga Kunoqoshadiisa 14:1; 39:5
 - b. boqorka – 2 Samuu’eel 7:11-16; Sabuurka 2:7

- c. tusaalayaasha falalka aabanimo – Sharciga Kunoqoshadiisa 1:31; 8:5; 32:1; Sabuurka 27:10; Maahmaahyadii 3:12; Yeremyaah 3:4,22; 31:20; Hoosheeca 11:1-4; Malaakii 3:17
- 2. waalid – Hoosheeca 11:1-4
- 3. hooyo – Sabuurka 27-10 (hooyada wax nuujisa); Ishacyaah 49:15; 66:9-13
- 4. jacaylka runsheegnimada yar – Hoosheeca 1-3

II. Sababaha isticmaalka luqada noocan ah

- A. Waxa lagama maarmaan in Ilaah naftiisa uu aadanaha u muujiyo. Fikirka Ilaah oo lagu tilmaamay labnimana waxa weeyi isagoo ah Ruux!
- B. Ilaah waxa uu qaataa macnayaasha aadanaha wax usamaynaya isaga oo naftiisa u muujinaya aadanaha leexday (aabbe, hooyo, waalid, jeclaade)
- C. Iyadoo lagama maarmaan ah, ayaa Ilaah aanu doonin inuu xadido qaab jidh ahaaneed (Baxniintii 20; Sharciga Kunoqoshadiisa 5)
- D. Muujinta ugu wayni waxay tahay ka dhex muuqashada Ciise! Ilaah waxa uu noqday jidh la taaban karo (1 Yooxanaa 1:1-3). Farriintii Ilaahna waxay noqotay Erayga Ilaah (Yooxanaa 1:1-18).

▣ **“ballankii Ruuxa Qoduuska”** Axdiga Hore waxa uu ballan qaaday maalintaa Ruuxa ee hoggaaminaysa xaqnimada taasi oo kaashanaysa shaqada Masiixa.

- 1. Yooxanaa 7:39, maalmihii cusbaa oo yimid.
- 2. Galatiya. 3:14, barakadaynta Ibraahim (cf. Bilowgii. 12:3) hadda waxay diyaar u tahay dunidoo dhan.
- 3. Efesos. 1:13, rumaystayaasha casriga cusub waxa lagu shaabadeeyay Ruuxa.

▣ **“waxan oo aad arkaysaan oo maqlaysaan”** waxa sii socota xoojinta wacdintani ku xoojinayso markhaatinimada dhegaystayaasha (cc. 14,22,32,33,36). Waxay ogsoonaayeen waxa Butros sheegayo oo ahaa run maxaa yeelay way joojeen meeshaas. Looyarraduna arrintan oo kale waxay ugu yeedhaan caddayn.

2:34 “Rabbigu wuxuu Sayidkayga ku yidhi” waa xigasho ka ahaatay Sabuurka 110:1 (YHWH...Adon). Ciise ayaa waxa uu ku adeegsaday Matayos. 22:41-46. Axdiga Cusub dhexdiisana waxa ay tusinaysaa arrinta labonimada ah ee boqortooyada; Ciise mar horeba waxa uu joogaa midigta Ilaah, laakiin cadaawayaashiisa xitaa ma joogaan raadka cagihisa. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3.

2:36 “Reer bini Israa’iil oo dhammu” waxa ay middani tilmaamaysaa hoggaamiyayaasha Yuhuudda iyo dadka waana kuwa uu Butros ugu horrayntaba la hadlayay. Waxa uu sheegayaa in waxsii sheegista Axdiga Hore in la dhammays tiray isla markaasna ay ku timid Ciisaha reer Naasetet. Eeg Mawduuga Gaarka ah. 1:3.

▣

NASB	“aad ha u ogaadeen”
NKJV	“ha u ogaadeen si hubaal ah”
NRSV	“ha ogaadaan iyagoo huba”
TEV	“hubaal ha ku ogaadaan”
NJB	“noqon karaan kuwo huba”

Middani waxa ay ka tarjumaysaa labo eray oo Giriig ah, falkaabaha *aphalōs*, oo macnihiisu yahay “si ammaana oo wax loo soo dhoweeyo” (iyadoo la hubo, 16:23) iyo falka wakhti xaadirka jooga ee amarka ah ee *ginōskō*, oo ah “in la ogaado.” Kuwan markhaatiga goob joogga ah ka ahaa usbuucii uugu danbeeyay ee Ciise dhimashadiisa iyo sarakicistiisa maaha kuwo uu shaki kaga jiro runta ku jirta erayada Butros.

▣ **“Rabbi iyo Masiixba”** ereyga “rabbi” (*kurios*) waxa loo adeegsan karaa macne guud ahaaneed ama mid gaar ahaaneed oo xambaarsan macne fiqi (aayadda 21). Waxa loogala jeedi karaa “sayid,” “mudane,” “mulkiile,” “xaas,” ama “qofka Ilaah u adeega.” Axdiga Hore (Cibraani, *adon*) adeegsigiisa eraygani waxa uu ka yimid ku dhawaaqista Yuhuuddu ay ku dhawaaqayeen magaca axdiga ee Ilaah, YHWH, kaasi oo ahaa qaabka falka Cibraaniga ah ee “ahaansho” (Baxniintii 3:14). Iyagu waxa ay ka cabsi qabeen jebinta Amarrada kaasoo yidhi

“Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin” (Baxniintii 20:7; Sharciga Kunoqoshadiisa 5:11). Haddaba, waxa ay u malaynayaan haddii aanay ku dhawaaqin magaca, in aanay been u qaadin. Sidaasi darteedna waxa ay ku beddeleen magaca Cibraaniga ah ee *adon*, kaasoo macnihiisu la mid yahay erayga Giriigga ah ee *kurios* (Rabbi). Qorayaasha Axdiga Cusubina waxa ay eraygan u adeegsadeen sheegitaanka ilaahnimada buuxda ee Masiixa. Erayada “Ciise waa Rabbi” waxa ay ahaayeen qirashada fagaarayaasha ee rumaysadka wakhtiyada baabtiiska ee kaniisaddii hore (cf. Rooma. 10:9-13; I Korintos. 12:3; Filiboyl. 2:11). Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:6.

“Masiix” waxa uu ahaa erayga Giriigga ah ee u dhigma erayga Cibraaniga ah ee *messiah*, oo macnihiisu yahay “mid la subkay” (cf. 2:31,36; 3:18,20; 4:26; 5:42; 8:5; 9:22; 17:3; 18:5,28; 26:23). Waxa lagu dabaqay “mid loo yeedhay oo Ilaah u qalabeeyay shaqo gaar ah.” Axdiga Hore dhexdiisa waxa laga helayaa saddex kooxood oo hoggamiyayaal ah: wadaaddada, boqorrada, iyo nebiyada, kuwaas oo ahaa kuwa la subkay. Ciise waxa uu buuxiyay dhammaanba saddexdan boos (Cibraaniyada 1:2-3). Eeg Mawduuca Gaarka ah: Masiix 2:31. Adeegsiga labadan magac ee Axdiga Hore oo loo adeegsaday Ciisaha reer Naaseret, ayaa Luukos waxa uu labadaba ku sheegayaa Ilaahnimadiisa (cf. Filiboy. 2:6-11, eeg Mawduuca Gaarka ah. 2:32) iyo Masiixa inuu yahay (Luukos 2:11). Middani haddaba waxa ay dejinaysaa heerka wacdinta (*kerygma*) ee wacdinaha kale ee ku jira Falimaha Rasuullada. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14.

▣ **“Ciisahan aad iskutallaabta ku qodobteen”** Butros waxa uu kuwan reer Yerusaaalem ah ku eedaynayaan dhimashadii Ciise. Haddaba dhammaanba aadanuhu waxa ay yihiin kuwo denbigan ka siman. Eeg fiirada 2:23.

▣ **“Ciisahan”** tilmaamitaanka “Ciisahan” (cf. 2:23,32,36) waxa ay la xidhiidhaa wacdinta Butros ee sarakicidda Ciise ee taariikhiga ah, waana Masiixa ammaanmay. Labada fikirbana waa run. Kitaabkuna kala saari maayo Ciisaha hore iyo Ciisaha rumaysadka!

NASB (UPDATED) TEXT: 2:37-42

³⁷Markay taas maqlen ayaa qalbiga laga wareemay, markaasay ku yidhaahdeen Butros iyo rasuulladii kale, Walaalayaalow, maxaannu falnaa? ³⁸Markaasaa Butros iyagii ku yidhi, Toobad keena, oo midkiin kasta ha lagu baabtiiso magaca Ciise Masiix dembidhaafkiinna aawadiis, oo waxaad heli doontaan hadiyadda ah Ruuxa Qoduuska ah ³⁹Maxaa yeelay, ballanka waxaa leh idinka iyo carruurtiinna iyo kuwa fog oo dhan in alla intii Rabbiga Ilaaheenna ahu u yeedho. ⁴⁰Hadallo kaloo badan ayuu markhaati ahaan ugu waaniyey isagoo leh, Naftiinna ka badbaadiya qarnigan qalloocan. ⁴¹Markaasaa kuwii hadalkiisii aqbalay la baabtiisay, oo waxaa maalintaas lagu daray iyaga abbaaraha saddex kun oo qof. ⁴²Oo waxay ku sii adkaysteen rasuulladu waxay bari jireen iyo xidhiidhka ka dhexeeyey iyaga, iyo kibista jebinteeda iyo tukasho.

2:37 “ayaa qalbiga laga wareemay,” tani waa erayga Giriigga ah ee *kata* oo loo geeyay *nso*. Eraygan asalkiisa waxa lagu dhex adeegsaday Yooxanaa 19:34 iyadoo loo adeegsaday Ciise oo lagu qodbay isku tallaabta. Haddaba wacdinta Butros waxa ay dhegaystayaashan ku wareentay xaqiiqada injiilka. Middanina waxa ay tilmaamaysaa garashasiinta Ruuxa Quduuska oo ah ka socodsiiyay badbaadada (cf. Yooxanaa 16:8-11; Rooma. 3:21-31).

2:38 “Toobad keena,” waa fal amar ah kaasi oo keenaya go’aan qaadasho. Erayga Cibraaniga ah ee towbad keenka waxa loogala jeedaa beddelitaanka camal. Erayga Giriigga ah waxa weeyi beddilaanka maanka. Towbad keenku waa doonitaanka isbeddel. Loogalama jeedo iyadoo gebi haanba la joojiyo denbi, laakiinse waa doonista lagu farxad gelinayo Ilaah, oon ahayn nafta. Haddii aan nahay aadanaha leexday waxa aan u noolnahay nafeheenna, laakiinse rumaystayaal haddaan nahay waxaan u noolnahay Ilaah! Towbad keenka iyo rumaysadku waxa weeyi waxyaalaha Ilaah uu uga baahanyahay badbaadada (cf. Markos 1:15; Fal 3:16, 19; 20:21). Ciise wuxuu yidhi “haddaydaan toobad keenin, kulligiin sidaas oo kale ayaad u lumi doontaan.” (Luukos 13:3,5). Towbadkeenku waa doonista Ilaah ka rabo aadanaha leexday (cf. II Butros. 3:9, Yexesqeel. 18:23, 30, 32). Qarsoodiga awoodda Ilaah iyo doonista xorta ah ee aadanaha waxa maamuli karta towbad keenka iyadoo ah midda laga rabo badbaadada. Si kastaba ha ahaatee, midda taas ka hor imanaysaa waxa weeyi hadiyadda Ilaah (cf. 5:31; 11:18 iyo II Timoteyos. 2:25). Hadiyo goor waxa jira dareen ku dhex sugan sida uu kitaabku uga hadlayo

nimcada Ilaah ee ugu horraynta ah iyo aadanaha oo u baahan ka jawaab celin. Axdiga Cusubi waa sida axdiga hore waxa uu haystaa “haddii...dabadeed” qaab ah. waxa jira erayo dhowra oo lagu dhex adeegsaday Axdiga Hore kuwaasi oo la xidhiidha fikirka towbad keenka.

MAWDUUC GAAR AH: TOWBAD KEENKA

Towbad keenka uu la socdo rumaysadku waa shuruudaha axdiga ee Axdiga Hore (*Nacham*, BDB 636, e.g., 13:12; 32:12,14; *Shuv*, BDB 996, e.g., I Boqorradii. 8:47; Yexesqeel. 14:6; 18:30) iyo Axdiga Cusub

1. Yooxanaa Baabtiisaha (Matayos 3:2; Markos 1:4; Luukos 3:3,8).
2. Ciise (Matayos 4:17; Markos 1:15; 2:17; Luukos 5:32; 13:3,5; 15:7; 17:3).
3. Butros (Falimaha Rasuullada 2:38; 3:19; 8:22; 11:18; 2 Butros 3:9).
4. Bawlos (Falimaha Rasuullada 13:24; 17:30; 20:21; 26:20; Rooma 2:4; 2 Korintos 2:9-10).

Waa maxay haddaba towbad keenku? Waa murugo iyo denbigoo la qoomameeyo. Cutubka sida aadka ah uga hadlayay ee ka midka ah Axdiga Cusub ayaa waxa uu yahay 2 Korintos 7:8-11.

1. *lupeō*, ‘murugo’ aayadda 8(labo jeer), 9(saddex jeer), 10(labo jeer), 11. Waa iyadoo laga murugooda denbiga.
2. (*metaneō* “towbad keen” aayadda 9, 10) Towabad kenid iyo qaab cusub oo loog fikiro arrintaas iyadoo laga fikirayo sidii fikir wanaagsan looga yeelan lahaa Ilaah.
3. *metamelomai*, “qoomamo” aayadda 8(labo jeer), 9. Qoomammayn iyo ka digtoonaa inaan mardanbe denbiga lagu dhicin. Waxa loo adeegsaday Yuudas sida aan ka arki karno Matayos 27:3 iyo Ceesaw sida aan ka arki karno Cibraaniyada 12:16-17.

Towbad keenka iyo rumaysadku waxa la rabaa inay ka muuqdaan camalka (Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 2:38,41; 3:16,19; 20:21). Waxa jira kuwo ka mida qoraallada oo sheegaya in Ilaah uu yahay kan bixiya towbad keenka (Falimaha Rasuullada 5:31; 11:18; 2 Timoteyos 2:25). Laakiinse qoraallada badankoodu waxay tilmaamayaan in towbad keenku uu lagama maarmaan u yahay dhammaanba aadaha si ay u helaana badbaadada Ilaah.

Macnaynta erayada Cibraaniga iyo Giriigguba waxay ay tilmaamayaan baahida loo qabo macnaha buuxa ee towbad keenka. Cibraaniyadu waxay dalbanaysaa “fal is beddel ah,” halka Giriigguna uu ka dalbanayo “bedelitaanka maanka.” Qofka badbaaday wuxuu helayaa qabli iyo maan cusub. Wuxuu u fikirayaa oo u noolaanayaan si gaar ah. Haddaba, halkii markii hore su’aashu ka ahayd “maxaa aniga dan ii ah?” imika waxay noqonaysaa “maxay tahay doonista Ilaah?” Towbad keenku maaha dareen keenaya denbi la’aanta, laakiinse waa xidhiidh cusub oo lala yeelanayo Ilaah Quduuska ah ee rumaystaha marwalba korinaya kana dhigaya mid quduus ah.

▣ “ha lagu baabtiiso” waa fal kale oo ah amar. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: BAABTIISKA

Curtis Vaughan, *Acts*, ayaa bogga 28 wuxuu ku qorayaa qormo xiiso leh:

“Erayga Giriigga ah ee ‘baabtiis’ waa mid muhiimadda saddexaad; erayga ‘towbad keenna’ waa muhiimadda labaad. Beddelkan amarka labaad ee badan lagu beddelay kan saddexaad ee yar oo ah ‘baabtiis’ waxa ka tarjumaya Butros dalabkiisii aasaaska u ahaa towbad keenka.”

Tani waxay haddaba raacsan tahay wacdintii Yooxanaa Baabtiisaha (Matayos 3:2) iyo Ciise (Matayos 4:17). Haddaba, towbad keenku waa furaha ruuxiga ah, halka baabtiiskuna ka yahay soo ban dhigista is beddelka ruux ahaaneed. Axdiga Cusubi waxba kama yaqaano rumaystayaal aan la baabtiisin oo la sheegay! Dhinaca kaniisaddii hore marka la eegana, baabtiisku wuxuu ahaa qofka oo rumaysadkiisa ku hor qirta dadka. Waxa kaloo la xasuusan karaa in baabtiisa aan lagu sheegin, wacdintii labaad ee Butros, inkastoo towbad keenka lagu sheegay (3:19; Luukos 24:17). Haddaba, baabtiisku wuxuu ahaa tusaale uu dejiyay Ciise (Matayos 3:13-18). Sidoo kalena baabtiiska Ciise ayaa amray (Matayos 28:19). Haddaba, su’aasha casriga ah ee waxa lagama maarmaanka u yahay baabtiiska ayaan lagu dhex sheegin Axdiga Cusub, laakiinse rumaystayaasha oo dhan waxa laga rabaa in la baabtiiso.

▣ **“magaca Ciise Masiix”** waa duurxul Cibraani ah (lagu sheegay Yoo’eel 2:32) kaasi oo tilmaamaya shakhsiayadda iyo dabeecadda Ciise. Waxa laga yaabaa in ay ahayd qaabkii baabtiiska ee kaniisaddii hore, taasi lagusoo celcelin jiray erayo ah “Waan rumaysanahay inuu Ciise yahay Rabbi” (cf. Rooma. 10:9-13; I Korintos. 1:13,15). Waxay ahayd sheegis fiqi ahaaneed iyo sheegis kalsooni ah oo shakhsi ahaaneed. Sida ku sugan adeegga wayn ee Matayos 28:19-20 magaca saddexmidnimada ayaa ah qaabka baabtiiska. Markale waa inaan iska ilaalinno waxyaalaha la xidhiidha qaabka! Magaca ama qaabku maaha ujeedada, laakiinse muhiimaddu waa qalbiga qofka la baabtiisayo. Wax ku saabsan “Masiix” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 2:31.



NASB, NJB,

NIV “dembidhaafkiinna aawadiis”

NKJV “cafiska denbiga aawaddiis”

NRSV “si dembiyadiinna loo cafiyo”

TEV “si denbiyadiinnu u noqdaan kuwo la cafiyo”

Su’aasha fiqi ahaaneed waxa weeyi sidee “aawadiis” (*eis*) ay u shaqaynasaa? Dembidhaafku ma waxa uu la xidhiidhaa “towbad keena” ama “ha la idinku baabtiiso”? dembidhaafku ma wuxuu ku tiirsanyahay towbad keenka ama baabtiiska?

Adeegsiyada suurto galka ah ee *eis* way badan yihiin. Ka badanaa la adeegsadaana waa “sababtaas aawadeed.” Badanaa culimada Baabtiistigu waxay doortaan “sidaas darteed” sababo fiqi ahaaneed aawadood, Laakiin waa ikhtiyaar yar. Badanaa erayada horgalaaga u ah maluhu waxa ay u shaqeyaan heerkan naxwe ahaaneed. Waa in Kitaabka aan u oggolaano inuu macnihiisu hadlo; kaddibna aan is barbar dhigno waxyaalaha isku midka ah; kaddibna waa inaan u gudubno fiqigeenna. Dhammaanba mufasiriintu taariikh ahaan, madaahib ahaan, iyo khibrad ahaanna waa shuruud ku xidhan.

Denbi dhaafka ku imanaya rumaysashada Masiixu waxa weeyi muhiimad kusoo noqnoqonaysa wacdimaha Falimaha Rasuullada (i.e., Butros 2:38; 3:19; 5:31; 10:43; iyo Bawlos 13:38).

▣ **“waxaad heli doontaan hadiyadda ah Ruuxa Qoduuska ah”** waa fal mustaqbalka ah waxna tusmaynaya. Hadiyadaha Ruuxu waxay ahaayeen

1. badbaado hubaal ah
2. dhex joogitaan
3. adeeg u qalabayn
4. koritaan la midnimada Masiixa ah.

Waa in aynaan riixin nidaamka dhacdooyinka badbaadada maxaa yeelay badanaa way ku kala duwan yihiin Falimaha Rasuullada dhexdiisa. Falimaha Rasuullada ujeeddadoodu maaha baaritaanka qaab ama arrin fiqi ahaaneed (cf. *How To Read the Bible for All Its Worth*, pp. 94-112), laakiin waxa ay diiwaan gelinayaan wixii dhacay.

Fasiraagu miyuu qoraalkan u adeegsan karaa sheegitaanka camallo badbaadada khuseeya: towbadkeen, baabtiis, denbi dhaaf, iyo kaddib hadiyadda Ruuxa? Fahankaygu waxa uu dalbanayaa Ruuxa oo ugu horraynta shaqaynaya (Yooxanaa 6:44,65) waana muhiim inta garasadshiintu ay socoto oo dhan (cf. Yooxanaa 16:8-12), towbad keen (cf. 5:31; 11:18; II Timoteyos. 2:25), iyo rumaysad. Ruuxu waa waxa ugu horreeya waana lagama maarmaan (Rooma 8:9) bilowga ilaa dhammaadka.

Mid ka mida kitaabbada iga caawiyay inaan muhiimadda siinin mad-habka aan raacsanahay balse aan awoodda siiyo Kitaabka ayaa waxa uu yahay F. F. Bruce, *Answers to Questions*. Waxa uu ku samaynayaa faallooyin wanaagsan oo ku saabsan Falimaha Rasuullada 2:38. Kuwa isoo jiiitayna waxa ka mid ah:

“Aqbalitaanka ruuxu waxa uu noqon karaa mid la arko ka hor baabtiiska (Fal 10:44), baabtiiska dabadiis (Fal 2:38), ama baabtiiska dabadiis oo loo geeyay ku jiritaankii gacmaha Rasuullada (Fal 8:16; 19:54)” (p. 167).

Dadka casriga waxa ay rabaan hadallo muuqda oo caqiido ah oo la sheegi karo, laakiin hadiyo goor waxa ay la fal galaan “qoraal daliil ah” oo ah qaab fasiraad ah waxaanay meel istaajiyaan oo ku doodaan inay ku habboontahay fahankooda (siminaar ku saabsan fasiraadda Kitaabka ka eeg www.freebiblecommentary.org).

2:39 “ballanka waxaa leh idinka iyo carruurtiinna” middani waxay iskaashi la samaynasay Axdiga Hore iyadoo khusaysa faraca iyo fikir qoys (Baxniintii 20:5-6 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:9-10; 7:9). Rumaysadka carruurta waxa saameeya waalidiinta waxayna ahayd masuuliyadda waalidiinta (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 4:9; 6:6-7; 20-25; 11:19; 32:46). Saamayntan iskaashiga ahi sidoo kale waxa ay ka muuqanaysaa Matayos 27:25 (“Dhiiggiisu ha ahaado annaga iyo carruurtayada korkooda”).

Ballan qaadka saamaynta rumaysadku waxa ay iga caawisay inaan isku halleeyo Ilaah oo rumaysadkayga u adeegsanaya saamayn, barako, iyo ilaalinta farcankayga (Sharciga Kunoqoshadiisa 7:9). Middani kamasoo horjeeddo masuuliyadda shakhsi ahaaneed, laakiinse waxay raacinaysaa saamayn iskaashi ah. Rumaysadkayga iyo adeegga rumaysadku ku jiro ee Masiixa aan ku haystaa waxa uu saamaynayaa qoyskayga iyo qoysaskooda (Sharciga Kunoqoshadiisa 7:9). Waa ballan qaad iyo rajo la yaab leh, rumaysadkuna waxa uu ku socdaa qoysaska.

Falimaha Rasuullada dhexdooda ballan qaadyada (2:39) Ilaah waxa ay koobsanayaan waxyaalo dhowra oo la xidhiidha Axdiga Hore:

1. cafiska denbiyada – 2:38; 3:19; 5:31; 10:43; 13:38-39; 26:18
2. badbaado – 2:21; 4:12; 11:14; 13:26; 16:31
3. Ruuxa – 2:38-39; 3:19; 5:32; 8:15-18; 10:44-48; 19:6
4. wakhtiyada dib u cusboonaysiinta – 3:19

▣ **“kuwa fog oo dhan”** Butros waxa uu la hadlayaa dadka Yuhuudda ah. ereyadanina waxa ay asal ahaan tilmaamayaan Yuhuuddii la musaafuriyay ee lagusoo celin doonay Dhulka Ballan qaadka (Ishacyaah 57:19). Si kastaba ha ahaatee, meelo kale waxa ay u muuqataa inay tilmaamayso kuwa aan Yuhuudda ahayn kuwaasoo ka fogaa garashada YHWH (cf. Ishacyaah. 49:1; Sekeryaah. 6:15). Warka wanaagsan ee injiilku waxa weeyi ka Ilaah runta ah ee aadanaha oo dhan ka abuuray ekaanshihiisa (Bilowgii 1:26-27), isagoo rabana inuu iyaga la sameeyo is weheshi (cf. I Timoteyos. 2:4; II Butros. 3:9). Middani waa rajada midnimada aadanaha oo dhan iyagoo ku midoobaya Masiixa. Isaga dhexdiisana ma jirto kala qaybin Yuhuud iyo kuwo aan Yuhuud ahayn, addoomo iyo kuwo xor ah, rag iyo dumar, laakiin dhammaantood way siman yihiin waana mid qudha (cf. Efesos. 2:11-3:13). Bawlos waxa uu adeegsanayaa xigashadan isagoo la hadlayay kuwa aan Yuhuudda ahayn sida ku sugan Efesos 2:13 iyo 17. Casriga cusub ee Ruuxu waxa uu keenay midnimo aan la filaynin!

MAWDUUC GAAR AH: TAWXIID

Fikirka ah “tawxiidku” (Ilaah keliya), oon ahayn keliya “ilaah sare” ee kuwa sanamyada ama ilaaha wanaagsan ee Iranianka labonimadood (Zoroastranism), ayaa gaar u ah Israa’iil (Ibraahim, 2000 C.H). Marka laga reebo in yar oo Masar dhexdeeda ah (Amenhotep IV, sidoo kale loo yaqaan Akhenaten, 1367-1350 ama 1386-1361 C.H.).

Fikirkan waxa lagu sheegay erayo badan oo Axdiga Hore dhexdiisa ah.

1. “cidi la mid maaha YHWH *Elohim*, yaga ” Baxniintii . 8:10; 9:14; Sharciga Kunoqshadiisa. 33:26; I Boqorradii. 8:23.
2. “cidi isaga kama dambayso,” Sharciga Kunoqoshadiisa. 4:35,39; 32:39; I Samuu’eel. 2:2; II Samuu’eel. 22:32; Ishacyaah. 45:21; 44:6,8; 45:6,21.
3. “YHWH waa mid keliya,” Sharciga Kunoqoshadiisa. 6:4; Rooma. 3:30; I Korintos. 8:4,6; I Timoteyos. 2:5; Yacquub 2:19.
4. “sidiisa cidina maaha,” II Samuu’eel. 7:22; Yeremyaah. 10:6.
5. “Ilaah keliya,” Sabuurka. 86:10; Ishacyaah. 37:16.
6. “Aniga ka hor Ilaah ma jirin, cidina igama dambaynaso,” Ishacyaah. 43:10
7. “ma jiro mid barbarkayga joogaa. . .ma jiro mid kale,” Ishacyaah. 45:5,6,22
8. “Ilaah kale ma jiro” Ishacyaah. 45:14,18
9. “Midaan aniga ahayni ma jiro,” Ishacyaah. 45:21
10. “ma jiro mid kale;. . .ma jiro mid aniga ila mid ahi,” Ishacyaah. 46:9

Waa in la qirto iyada oo caqiidadan muhiimka ah si koritaan ah loo muujiyay. Erayada hore waxa loo fahmi karaa tawxiidnimo la taaban karo (waxa jira ilaahyo kale, laakiin anagu hal Ilaah ayaan leenahay cf.

Baxniintii. 15:11; 20:2-5; Sharciga Kunoqoshadiisa. 3:28; 5:7; 6:4,14; 10:17; 32:12; I Boqorradii. 8:23; Sabuurka. 83:18; 86:8; 136:1-2).

Aayadaha ugu horreeya waxa ay ku bilaabmayaan kelinimo (tawxiidnimo faylosuufi ahaaneed) waa kuwa ugu horreeya (cf. Baxniintii. 8:10; 9:14; Sharciga Kunoqoshadiisa. 4:35,39; 33:26). Sheegashada buuxdana waxa laga helayaa Ishacyaah 43-46 (cf. 43:11; 44:6,8; 45:7,14,18,22; 46:5,9).

Axdiga Cusubi waxa Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4 ku sheegayaa Rooma. 3:30; I Korintos. 8:4,6; Efesos. 4:6; I Timoteyos. 2:5; iyo Yacquub 2:19.

Tawxiidnimad kitaabiga ahi waxa ay ku caan tahay

1. Ilaah waa mid waana gaar
2. Ilaah waa shakhsi (cf. Bilowgii. 1:26-27; 3:8)
3. Ilaah wuxuu leeyahay dhaqan (cf. Baxniintii. 34:6; Nexemyaah. 9:17; Sabuurka. 103:8-10)
4. Ilaah aadanaha wuxuu ka abuuray ekaanshihiisa (Bilowgii. 1:26-27) isagoo u abuuray weheshi (i.e., #2). Waa Ilaah hinaasa (cf. Baxniintii. 20:2-3)

Axdiga Cusub

1. Ilaah waxa uu leeyahay saddex shakhsiyadood oo is muujino ah (eeg Mawdiica Gaarl aj: Saddexmidnimada 8:11).
2. Ilaah waxa uu si buuxda isugu dhex muujiyay Ciise (cf. Yooxanaa 1:1-14; Kolosay. 1:15-19; Cibraaniyada. 1:2-3)
3. Ilaah qorshiihiisa weligiisba ahaa ee ku waajahan cafisku waa inuu Wiilkiisa keliya u bixiyo qurbaan ahaan (Ishacyaah 53; Markos 10:45; II Korintos. 5:21; Filiboy. 2:6-11; Cibraaniyada).

▣ **“in alla intii Rabbiga Ilaaheenna ahu u yeedho.”** Waa fal cid wax loogu nisbaynayo. Asal ahaan waxa ay tilmaamaysaa Yuhuudda. Ilaah hadiyo goorba isaga ayaa wax bilaaba (cod dhexe, Yooxanaa 6:44,65). Yexesqeel 18:32; Yooxanaa 3:16 I Timoteyos. 2:4; II Butros. 3:9 waxa aan ka ogaanaynaa isagoo aadanaha oo dhan ugu yeedha xaggiisa. Laakiin, iyaguna waa in ay ka jawaab celiyaan.

Ereyada “badan” iyo “dhammaan” kitaabi ahaan waa kuwo siman (is barbar dhig Ishacyaah. 53:6, “dhammaan” iyo Ishacyaah. 53:11,12, “badan” ama Rooma. 5:18, “dhammaan” iyo Rooma . 5:19, “badan”). Ilaah waxa uu rabaa dhammaanba aadanaha lumay ee uu ka sameeyay ekaanshihiisa (Bilowgii 1:26-27), iyadoo loo abuuray inay isaga weheshadaan (Bilowgii 3:8).

2:40 “Hadallo kaloo badan” middani waxa ay inoo caddaynasaa in wacdimaha lagu diiwaan geliyay Falimaha Rasuulladu ay yihiin kuwo lasoo koobay. Waxa kaloo sidan la mid ah waxbaristii iyo wacdintii Ciise ee ku sugan Injiillada. Inaguna waxa aan qiraynaa waxyiga iyo saxsanaanta waxyaalaha lasoo koobay. Dunidii qarnigii ugu horreeyay waxa ay caan ku ahaayeen in afka wax la isugu gudbiyo.

▣ **“markhaati ahaan ugu waaniyey”** ereyga Giriigga ah (*dia* lagu daray *marturomai*) waxa ay caan ku tahay Luukos (cf. 2:40; 8:25; 10:42; 18:5; 20:21,23,24; 23:11; 28:23; Luukos 16:28). Injiilku waxa uu wataa xaqiiqo aan la iska indho tiri karin.

▣ **“isagoo leh,”** aadanuhu waa inuu u jawaab celiyo waxa Ilaah uugu deeqay ee uu ku siiyay Masiixa (cf. Yooxanaa 1:12; 3:16; Rooma. 10:9-13). Tanina waxa ay arrinta isku liddiga ah ee awoodda Ilaah iyo xorriyadda doonista aadanaha (cf. Filiboy. 2:12-13).

NASB, NKJV “is badbaadiya”

NRSV, TEV,

NJB

“Naftiinna ka badbaadiya”

Qaabka ereyadani waa fal amar ah, laakiin sida aad sheegi karto, NRSV, TEV iyo NJB waxa ay u tarjumayaan sida cod dhexe. Tanina waa dareenka fiqi ahaaneed ee khuseeya badbaadada (cf. Filiboy. 2:12-13). Dhammaan ma Ilaah bay u ahaatay, mise dhegeystaha Ilaah ayaa u oggolaanaya noloshihiisa?

Ereyga Giriigga ah “badbaaday” (*sōsō*) waxa ay ka tarjumaysaa fikirka Cibraaniga ah (*yasha*, BDB 446, cf. Baxniintii . 14:30) ee badbaadinta la taaban karo (cf. Yacquub 5:15,20), halka Axdiga Cusub dhexdiisa ay kala xidhiidho badbaadinta ruuxi ahaaneed ama badbaadada (cf. Yacquub 1:21; 2:14; 4:12).

MAWDUUC GAAR AH: ERAYGA GIRIIGA AH FALKA JUMLADA LOO ADEEGSADAY BADBAADADA

Badbaadadu maaha wax soosaar, balse waa xidhiidh. Kuma dhammaan marka mid aammino Ciise, way ka billaabantaa uun! Ma ah sidii siyaasad caymiska dabka oo kale ah, ama tigidh jannada too s loogu tago, balse in lagu koro nolol ekaanshaha Ciise. Waxaa jirta maahmaah Maraykanka oo tidhaahda, inta badan ee lamaane wada noolaadaan, waxay keentaa in ay isu sii eegaadaan. Waa tani haddaba qasdiga badbaadadu!

BADBAADADA OO AH FICIL KAAMIL AH (AORIST)

- Faliimaha Rasuullada 15:11
- Rooma 8:24
- II Timotiyas 1:9
- Tiitas 3:5
- -Rooma 13:11 (ayaa waxay u keenta AORIST wacyi galin mastaqbalka ah)

BADBAADADA WAA XAALAD AHAANSHO (dhawaan kaamilmay)

- Efasos 2: 5,8

BADBAADADA WAA HANAAN GEEDI SOCOD SOCDA (WAKHTI XAADIR)

- I Korintiyas 1: 18; 15:2
- II Korintiyas 2:15
- I Butrus 3:21

BADBAADAD WAA ISTICIMAAL AAYAHA DANBE (JUMLAD FAL MUSTAQBAL AH)

- Rooma 5:9,10; 10:9,13
- I Korintiyas 3:15; 5:5
- Filiboy 1:28;
- I Tesalonika 5:8-9
- Cibraaniyad 1:14,9:28
- I Butrus 1:5,9

Sidaasi darteed badbaadadu waxay la bilaabantaa, goaan qaadasho rumaysad, (cf. Yooxaana 1:12,3:16; Rooma 10:9-13), laakiin tani waa in ay ahaataa qodob hab nololeed hannaan geedi socod ah (cf. Rooma 8:29; Galaatiya 3:19; Efasos. 1:4; 2:10), taasi oo maalin ahaan doonta faham laga la isticimaalo. (cf. Yooxaana 3:2). Xaaladan kama danbaaysta ah waxaa la yidhaa ammaanida. Tani waxa loo qeexi karaa sidan

1. Ammanid bilow ah- daahirinta (ka soo badbaadintii ciqaabtii dilka)
2. Badbaado socota-quduus ka dhid (ka soo badbaadintii xoogga danbiga)
3. Badbaadada kama danbaaysta ah-ammaanida (ka soo badbaadinta joogitaankii danbiga).

▣ **“qarnigan qalloocan.”** Tani waxa laga yaabaa in ay si toos aan ahayn uga hadlayso Sharciga Kunoqoshadiisa 32:5 iyo Sabuurka 78:8. Asal ahaan erayada Axdiga Hore ee “xaq,” “xaq ah” “caddaalad” waxa ay aaheen asaasi (eeg Mawduuca Gaarka ah 3:14). Waxa ay noqotay tusaale hadiyo goor laga qiyaas qaato. Ilaah waxa uu shabahaaddan ama tusaalahan u doortay sheegitaanka dabeecaddiisa. Badanaa erayada loo adeegsado denbiga ee Cibraaniga iyo Giriigguna waxa ay kasoo horjeedaan dabeecaddiisa. Haddaba aadanaha oo dhammi waxay u baahi qabaan in la badbaadiyo.

2:41

NASB “aqbalay”

NKJV “si farxad leh u aqbalay”

NRSV “soo dhoweeyay”

TEV “rumaystay”

NJB “aqbalay”

Waa falka dhacay wakhtiga tegay ee *apodechomai*. Louw iyo Nida, *Greek-English Lexicon*, waxay ku diiwaan gelinayaan saddexda adeegsi ee eraygan (vol.2. p. 28).

1. soo dhowaynta qof
2. wax oo la rumaysto kaddibna laga jawaab celiyo
3. garawsiga runta ama qiimaha uu wax leeyahay

Luukos eraygan in badan ayuu adeegsanayaa (cf. Luukos 8:40; 9:11; Acts 2:41; 18:27; 24:3; 28:30). Injiilku waa shakhsi lasoo dhaweeyo, waana xaqiiqo ku saabsan qof oo la rumaysto, sidoo kalena waa nolosha qofkaas oo sidiisa oo kale loo noolaado. Saddexdubana waa muhiim.

▣ **“la baabtiisay”** Baabtiisku waxa uu ahaa wax diin ahaan la filo marka ay galaan macbadka. Kuwa soo galayana shakhsi ahaan baa loo baabtiisi jiray. Middani waxay ahayd dhacdo diin ahaaneed oo la fili jiray laakiinse macno cusub iyadoo wadata. Ciise waa la baabtiisay (Matayos. 3:13-17); sidoo kalena wuxuu inagu amray inaan baabtiisno (Matt. 28:19) taasina middaas ayay dejinaysaa. Axdiga Cusubi waxba kama oga rumaystayaasha aan la baabtiisin. Waxa ay iila muuqataa inay ahayd bar bilowga kala goyna Yuhuudda iyo bilowga dadka cusub ee Ilaah (kaniisadda, cf. Galatiya. 6:16).

▣ **“saddex kun oo qof”** tani waa tiro aad u wayn. Butros farriintiisiina waxa ay soo jiidatay markhaatiyaashan goob joogga ah. iyagu waxay diyaar u ahaayeen in ay dhex galaan rumaysadka la rabay inay rumaystaan.

1. Ciise wuxuu ahaa Masiixa
2. Masiixa waxa la rabay inuu silco
3. rumaysashadiisu waxay ahayd jidka keliya ee cafiska
4. baabtiiskuna wuxuu ahaa mid habboon

Arrintan waxa laga rabaa beddelitaanka nolosha iyo go’aanka (sida maanta oo kale)! Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14.

2:42 “waxay ku sii adkaysteen” Luukos fikirkan marar badan ayuu adeegsanayaa (cf. 1:14; 2:42,46; 6:4; 8:13; 10:7). Fiiro u yeelo waxyaalaha ay sameeyeen markay wada joogeen:

1. waxbaris (cf. 2:42; 4:2,18; 5:21,25,28,42)
2. is weheshi
3. jebinta kibista (i.e., waxa laga yaabaa inay sheegayso Cashada Rabbiga, eeg fiirada aayadda 46)
4. tukasho (cf. aayadaha 43-47)

Kuwani waa waxyaalaha la rabo inaan barno rumaystayaasha cusub! Rumaystayaashan cusubina waxay u gaajo qabeen xaqiiqada iyo bulsho. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: KOINŌNIA

Ereyga “is weheshi” (*koinōnia*) wuxuu la macne yahay

1. Xidhiidh dhow oo cid lala yeesho
 - a. Lala yeesho Wiilka (cf. I Yooxanaa 1:6; I Korintos 1:9).
 - b. Lala Ruuxa yeesho (cf. II Korintos 13:13; Filiboy 2:1).
 - c. Lala yeesho Aabbaha iyo Wiilka (cf. I Yooxanaa 1-3).
 - d. Lala yeesho walaalaha kale ee Axdiga (cf. I Yooxanaa 1:7; Galatiya 2: 9; Felimon 17).
2. Xidhiidh dhow oo lala yeesho shay ama koox
 - a. Lala yeesho Injiilka (cf. Filiboy 1:5; Felimon 6).
 - b. Lala yeesho dhiigga Masiixa (cf. I Korintos 10:16).
 - c. Aan lala yeelan gudcurka (cf. II Korintos 6:14).
 - d. Lala yeesho silicii (cf. Filiboy 3:10; 4:14; I Butros 4:13)

3. Hadiyad ama caawin si naxariisa loo sameeyo (cf. Rooma 12:13; 15:26; II Korintos 8:4; 9:13; Filiboy 4:15; Cibraaniyada 13:16)
4. Ilaah hadiyaddiisa soo marta Masiixa, taasoo dib u soo celisa Isaga iyo walaalihis wiilal iyo gabdhoba.

Tani waxa ay caddaynaysaa xidhiidhka qumaatiga ah (ka aadane ku aadane) oo uu ku imanayo xidhiidhka jiftada ah (ka aadane Ku Abuuraha). Tani waxa ay qeexaysaa baahida loo qabo iyo farxadda bulshada Masiixiyiinta ah. Ereyga falka waqtiga jooga ah waxa uu xoojinayaa biliowga iyo sii socoshada waayo aragnimadan bulshadatan (cf. 1:3 [mar labaad],6,7). Masiixiyaddu waa iskaashi!

NASB (UPDATED) TEXT: 2:43-47

⁴³Oo naf kasta cabsi baa gashay; oo rasuulladii waxay sameeyeen yaabab iyo calaamooyin badan. ⁴⁴Oo kuwii rumaystay oo dhammu waa wada jireen, wax walubana waa ka wada dhexeeyeen; ⁴⁵oo intay iibiyeen waxyaalahoodii iyo alaabtoodiiba ayay dhammaan u wada qaybiyeen sidii nin kasta baahidiisu ahayd. ⁴⁶Oo maalin walba iyagoo isku wada qalbi ah ayay macbudka ku jiri jireen, oo kibistana guryahooday ku jejebin jireen, cuntadoodana farxad iyo qalbi daacad ah ayay ku cuni jireen. ⁴⁷Ilaah bay ammaani jireen, oo dadka oo dhammuna waa u bogay iyaga. Ilaahna maalin walba kuwa badbaadaya ayuu ku dari jiray.

2:43-47 middani waxay u muuqataa inay tahay midda ugu horraysa faallooyin uu samaynayo Luukos (i.e., 6:7; 9:31; 12:24; 16:5; 19:20). Eeg Hordhaca. “Ujeeddada iyo Qaabka,” A.

2:43 “**Oo naf kasta cabsi baa gashay**” Waa fal aan ahayn ebyan waxna tusmaynaya. Joogitaanka Ilaah iyo awooddiisu waxa ay sababtay jawi quduus ah iyadoo xitaa denbiilayaasha aan badbaadini ay dareensanayeen waxa meeshan iyo wakhtigan ka jira.

2:44 “**Oo kuwii rumaystay oo dhammu**” eeg fiirada 3:16.

▣ “**wax walubana waa ka wada dhexeeyeen**” khibraddan hore ee ka dhaxashay “bulshadu” may ahayn mid guul leh (4:32-5:11). Loogalama jeedin inay ahaato nidaam la raaco oo caalami ah, laakiinse waxay ahayd isku day ah jacayl iyo bulsho is taageeraysa. Waa tusaale wanaagsan oo tusinaya in wax kasta oo ku diiwaan gashan kitaabku uu yahay midaan loogala jeedin arrin caalami ah oo la hir geliyo. Rumaystayaashan hore waxa ay isu hayeen jacayl wayn, waxaanay jacaylkan oo kale dib u heli karnaa marka aan dareenno awoodda iyo awoodda Ilaah oo dhexdeenna joogta (cf. Yooxanaa 17:11,21,22,23)!!

2:46 “**iyagoo isku wada qalbi ah**” kaniisaddii ugu horraysay waxa dabecad u ahayd midowgan iyo ujeeddadan (cf. 1:14; 2:46; 4:24; 5:12). Maaha iyadoo la leeyahay wax kasta way isku waafaqsanaayeen, laakiinse qalbiyadooda iyo maankoodu waxa uu ku wada jiray boqortooyada iyagoo ujeedooyinka shakhsi ahaaneed ka hor marinaya.

▣ “**macbudka ku jiri jireen**” waxa ay ku kulmeen “macbadkii Sulaymaan” (cf 3:11; 5:12). Ciisena halkaas ayuu wax ka bari jiray (cf. Yooxanaa 10:23). Macbadka Sulaymaan waxa uu dhinaca bari ka xigay maxkamadda kuwa aan Yuhuudda ahayn ee Macbadka Herodos dhexdiisa (cf. Josephus’ *Antiq.* 15.11.3). rabbaaniyuuntana halkaas ayay wax ka bari jireen hadiyo goorma dadku halkaas ayay isugu soo iman jireen si ay u maqlaan waxbaristooda.

Fiiro u yeelo iyada oo kaniisaddii ugu horraysay ay tegi jireen macbadka iyo sinagoogyada ilaa intii ay rabbaaniyiintu iyaga ku soo rogeen in la habaari (ku dhowaad 70 C.D.), taasi oo dadka xubinta ka ah sinagooga ku sababtay inay habaaraan Ciise. Tanina waxa ay sababtay in ay kala go’aan kaniisadda iyo macbadku. Rumaystayaashii ugu horreeyayna waxa ay wateen caabudaaddooda usbuuc kasta ah, laakiinse sidoo kale waxay

kulmi jireen Axadda si ay u xusuustaan sara kicistii Ciise. Xasuuusnow in Ciise laftiisu uu xerta la kulmayo saddex Axadood oo isku xigtay.

▣ **“oo kibistana guryahooday ku jejebin jireen”** haddii “jebinta kibistu” ay calaamad u ahayd Cashada Rabbiga (cf. Luukos 22:19 iyo gaar ahaan macnaha [I Korintos. 11:17-22; II Butros. 2:13-14; Yuudas aayadda. 12] kaniisaddii hore dhexdeeda , ex. Fal 20:7), markaa middani waxa ay sheegaysaa cashada Rabbiga ee maalin walba la samayn jiray (laakiin waa in sidoo kale la qirto iyadoo loo adeegsaday cunno ahaan sida ku sugan Luukos 24:30,35). Ka taxaddir dhibaadada ka iman karta dhaqamada iyo waxyaalaha ku saabsan goorta ama qaabka Cashada Rabbiga. Muhiimadduna waa qalbiga!

▣
NASB “farxad iyo qalbi daacad ah”
NKJV “farxad iyo laab furnaan
NRSV “farxad iyo qalbiyo faraxsan”
TEV “farxad iyo qalbiyo is hoosaysiin leh”
NJB “farxad iyo daacadnimo”

Kala duwanaanshaha tarjumaadaha ereyga labaad waxa uu tusinayaa adeygga ku jira tarjumaadda *aphelotēs*. macno ahaan waxa loogala jeedaa dabcsan, laakiin tusaale ahaan waxa loo adeegsaday “fudayd,” “daacadnimo,” ama “is hoosaysiin” (Louw and Nida). Eeg Mawduuca Gaarka ah: 1:24.

2:47

NASB, NKJV “dadka oo dhammuna waa u bogay iyaga.”
NRSV “dadka oo dhammuna way ka heleen iyaga”
TEV “iyadoo dadka oo dhammina ay u bogayeen”
NJB “cidkastaana way u bugtay iyaga”

Erayadani waxay tilmaamayaan Masiixiyiintii ugu horraysay oo ay aqbaleen dadka Yeruusaalem. Dhammaanba noocyada kala duwan ee dadku si fiican ayay uuga fikireen rumaystayaashan. Masiixiyiintu wax dhibaato ah kumay haynin xukuumaddii Roomaanka iyo nabadda (mid ka mida ujeedooyinka Falimaha Rasuullada). Bilowgii kaniisaddana may jirin dhibaato dhex taallay iyaga iyo rabbaaniyiinta Yuhuudda.

▣ **“Ilaahna maalin walba kuwa badbaadaya ayuu ku dari jiray”** waa fal aan ebyan ahayn waxna tusmaynaya. Kitaabku waxa uu xoojinayaa awoodda Ilaah. Ma jiro wax ka baxsan awoodda iyo doonista Ilaah oo dhacayaa, mana jiro wax la yaab gelinaya Ilaah. Si kastaba ha ahaatee, qaab waxsheegista ah ee Axdiga Hore waxa weeyi tawxiidnimo (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:39) si qaldan loo fahmay. Waxa aan jeclahay inaan soo geliyo labo Mawduuc Gaar, midi waa baahida loo qabo dheelli tirka midan waxa uu ku saabsan yahay axdiga. Waxa aan rajaynayaa in middani way wax iftiimin doonto.

MAWDUUC GAAR AH: DOORASHO/ QADARKA IYO BAAHIDA LOO QABO ISU DHEELI TIRKA FIQI AHAANEED

Doorashadu waa mad’han aad cajiib u ah. Arrintu si kastaba ha ahaatee, laakiin ma aha wax la iska samaysan karo ee waa u yeeris in aad noqoto durdur, qalab oo aad kuwa kale madax furasho u noqotid! Axdigii hore ereyga waxaa loo isticmaali jiray marka ugu horraysa adeeg, Axdiga Cusubna waxaa loo isticmaalay marka ugu horraysa badbaadada. Kitaabka Qudduuska ah marna wax is burinaya kam uusam dhigin qorshaha Ilaah iyo doorashada xorta ah ee aadanaha, laakiin wuu xoojiyaa labadaba. Tusaale wanaagsan oo aan qaadan karno oo ku saabsan xiisadda baybalka waxaa ka helaynaa Rooma 9 ee ah Doorashada Ilaaha qaaddir ah iyo Rooma 10 oo ah jawaabta lagama maarmaanka ah ee laga doonayo aadanaha (cf. 10:11, 13).

Furaha xiisaddan barashada Ereyga Ilaah waxaa laga heli karaa Efesos 1:4 Ciise ayaa ah ninka Ilaah u doortay in kuwa kale oo dhan isaga ay doorasho ku helaan. (Karl Barth). Ciise waa “Haada” Ilaah ee baahida

aadanihii dhacay (Karl Barth) Efesos 1:4 waxa ay sidoo kale caawinaysaaiyaga oo sheegaya in yoolka iyo doorashadii hore aysan ahayn in la galo jannada, laakiin qudduusnimo (U ekaanta Masiixa). Had iyo jeer waxaa na soo jiita faa'iidooyinka ku jira Injiilka masuuliyadha se waannu iska dhego tirnaa! Uyeerista Ilaah (Doorashada) waxay leedahay waqti si la mid ah si nolosha weligeed ah oo kale!

Mad'habuhu waxa ay ku xiriir lala yeesho rumaysadyada kale, ma aha mid keliya, run aan isku xirnayn. Isla socoshada wanaagsan waxa ay tahay in aayadaha laga dhigo in ay yihiin sidii hal xiddig oo kale. Ilaah wuxuu runta u soo diraa bariga, ma aha galbeedka ma aha nooc. Waa in aynaan kala qaadin maxaa yeelay waxay siugu xiran yihiin hab isu sar go'an:

1. Doorashadii hore oo ka soo hor jeedda doorashada xorta ah ee
2. Ammaanka rumaystayaasha oo ka soo hor jeedda u baahnaanta dib u xallinta.
3. Dembigii hore oo ka soo hor jeeda xal u helista dembiga.
4. Dembi la'aanta (kaamilnaanta oo ka soo hor jeedda dembi yaraanta.
5. Bilowga qudduus ka dhigidda, iyo qudduus noqoshada oo ka soo hor jeedda qudduus noqosho horumar leh.
6. Xorriyadda Masiixiga oo ay ka soo hor jeeddo masuuliyadda Masiixiga
7. God's Transcendence vs. God's Immanence
8. Ilaah oo aan sinnaba loo ogaan Karin qorshihiiisa dambe oo ka soo hor jeeda sida Ilaah looga ogaan karo qorniinka dhexdiisa
9. Boqortooyada Ilaah oo joogta iyo liddigeeda oo ah kaamilnimada mustaqbalka
10. Tawbadkeenka oo ah hadiyad Ilaah oo ay ka soo hor jeeddo tawbadkeen lagama maarmaan u ah jawaab axdiyeed
11. Ciise oo ah mid Ilaah oo ay liddi ku tahay Ciisde oo Bani aadan ah
12. Ciise wuxuu la mid yahay aabbaha oo ay ka soo hor jeeddo Ciise oo adeege u ah Aabbaha

Barashada tiyooloji ahaaneed ee "axdiga" waxa ay midaynaysaa sarraynta Ilaah (in mar kasta uu leeyahay go'aanka uu doonayo in uu wax ku habeeyo) oo leh bilow la qorsheeyay iyo iyo tawbadkeen cosda, iyo jawaab rumaysad oo ka timaaddo aadanaha. Ka taxaddar in aad hal qayb ka qaadatid qoraalka wada socda oo aad qaybta kalena ka tagtid! Ka taxaddar in aad qaadatid go'aan adiga ku gaar ah oo aad ku tafsiiranaysid mad'habtaad leedahay ama hab kale oo tiyoojagi!

MAWDUUC GAAR AH: AXDI

Ereyga *Berith*, (BDB 136), ama Axdi ee Axdigii Hore, ma fududa in la qeexo. Ma jiro erey fal ah oo la mid ah Afka Cibraaniga dhexdiisa. Isku dayadii la sameeyay oo dhammi waxa ay noqdeen kuwo aan si toos ah u qeexayn. Arrintu si kastaba ha ahaatee, bar dhexaadda ujeeddadu waxa ay `kuwii aqoonta lahaa ku qasabtay in ay baadhaan adeegsiga ereyga si ay isugudayaan in ay xaqiiqsadaan macnaha uu ku shaqaynayo.

Axdi macnahisu waxaa weeye kan uu Ilaaha runta ahu kula xidhdho ama kula macaamilo abuurtiisa aadanaha ah. Ujeedka axdi, macaamil, ama heshiis waa mid aad muhiim ugu ah fahanka muujinta Baybal ahaaneed. Arrinta u dhexaysa wayenaanta awoodda Ilaah iyo doonista xorta ah ee aadanaha waxaa si cad looga dhex arki karaa gudaha ujeeddada axdiga. Axdiyada qaar waxa ay ku salaysan yihiin ujeedooyinka, falimaha, iyo dabciga Ilaah.

1. Uunka naf ahaantiisa (cf. Bilowgii 1-2)
2. U yeeristii Abraham (cf. Bilowgii 12)
3. Axdigii lala dhigtay Abraham (cf. 15)
4. Dhawristii iyo ballankii Muux (cf. Bilowgii 6-9)

Arrintu si kastaba ha ahaatee, dabecadda axdiga waxay u baahan tahay ka fal celin

1. Aadan waa in uu rumaysadkiisa awgii ku addeecaa Ilaah oo uusan cunin midhihii Ceedan ku dhex yiil cf. Bilowgii 2)

2. Abraham waa in uu rumaysadkiisa awgii ka ka tagaa qoyskiisa, raacaa Ilaah, oo rumaystaa faracyada mustaqbalka (cf. Bilowgii 12,15)
3. Nuux waa in uu rumaysadkiisa awgii ku dhisaa doon weyn meel biyo ka fog oo uu xayawaanka isugu keenaa (6-9)
4. Muuse rumaysadkiisa awgii ayuu dadka reer binu Israa'iil kaga soo saaray Masar wuxuuna xeerar diimeed oo muuqda ugu helay noloshii bulshada, ballamihii balamihii barakooyinka iyo inkaaraha awgood (cf. Sharciga ku noqoshadiisa 27-28)

Aerrin noocan oo kale ah oo ay ku jirto xiriirka Ilaah ee aadanaha ayaa waxa ay ku caddanaha “Axdiga Cusub.” Arrintan waxaa si toos ah loo barbar dhigi karaa tii tii Yexesqeel.18 iyo Yexesqeel 36:27-37. Axdigu ma wuxuu ku salaysan yahay Ilaah shaqadiisa nimcada leh mise jawaabo aadane oo la go'aamiyey? Tani waxay ku saabsan tahay arrintii gubashada ee Axdigii Hore iyo kan Cusub. Labadaba ujeeddooyinkoodu waa isku mid: (1) dib u soo celintii wehelnimadii luntay sida ku jirta Bilowgii 3 iyo (2) samaynta dad xaq ah oo ay ka soo ifto dabeecadda Ilaah.

Axdiga cusub ee Yerenyaah 31:31-34 waxa uu xallinayaa xiisadda isagoo wax qabashada aadanaha uga bixinaya in ay sidii wax aqbalaad lagu gaarayo. Sharciga Ilaah waxa uu noqonayaa rabitaan gudaha ah booskii wax qabashada dibadda. Hadafka ama ujeedka dadka xaqa ah ee Ilaah aaminsan sidiisii ayuun buu sii ahaadaa laakiin qaabka ayaa is beddela. Aadanihii dhacay waxay nafsad ahaantoodii isu caddeeyeen in aysan ahayn kuwo ku filan in ay araggii Ilaah ka soo ifo iyaga (cf. Rooma 3:9-18). Dhibaatadu ma ahayn axdiga, laakiin dembi badnaanta iyo tabar yaraanta aadanaha (cf. Galatiya 3).

Arrintan mid la mid ah ee ah axiga aan shuruudda ku xidhnayn iyo kan shuruudda ku dhidhan ee k u jira Axdigii Hore, ayaa ku ekaaday Axdiga cusub. Badbaadada lama dhaafaankeedu dabcan waxay wax xor ah ku noqotay shaqadii Ciise Masiix, laakiin waxa u baahan tahay tawbadkeen iyo aamminaad (marka aad bilowdo iyo kala joogsi la'aan labadaba). Waa mid si sharci ah magic u ah oo loogu yeeri karo u-ekaanta Masiixa, oo ah hadal caddayn u ah aqbalaadda lagama maarmaanna u ah qudduusnimada! Rumaystayaashu kumaysan badbaadin hawl qabdkooda, laakiin addeecid ayey ku badbaadeen (cf. Efesos 2:8-10). U noolaanshaha si Ilaah raalli ka yahay waxa ay noqotaa caddaynta badbaadada, ma aha macnaha badbaadada.



NASB, NRSV “tiradooda”

NKJV “kaniisadda”

TEV “kooxda”

NJB “dadka”

Erayada *epi to auto* waxa lagu dhex adeegsaday luqadii Koine ee Giriigga (Sebtuujantiga iyo Fal 1:15; 2:1,47; I Korintos. 11:20; 14:23), iyadoo macneheedu yahay “isu imaansho” (Metzger, *Textual Commentary*, p. 305). Halkan Axdiga Cusub dhexdiisa waxa ay ku sheegaysaa kulanka kaniisadda, sidaasi darteedna, Ilaah ayaa kaniisadda kusoo kordhinayay maalin kasta. Tani waxa ay tusinaysaa qaab nololeedka wacdinta ee facii rumaystayaashii ugu horreeyay.

▣ **“kuwa badbaadaya”** Ereyada “Ilaahna (Ilaah ama Masiixa) wuxuu kusoo dari jiray,” waxa mar hore lagu dhex adeegsaday aayadda 46, waana fal aan ebyan ahayn oo wax tusmaynaya, laakiin ereyadan waxa weeyi wakhti xaadirka jooga adeegunaha waa Ilaah. “badbaadaya” waxa weeyi wax si joogto ah u soconaya. Badbaadadu waxay ku bilaabantaa rumaysad (i.e., Yooxanaa 1:12; 3:16; Rooma. 10:9-13). Badbaadadu waa xidhiidh Ilaah/Ruuxu uu bilaabo (cf. Yooxanaa 6:44,65), laakiinse waxa weeyi khibrad si joogto ah u socota. Maaha tikidh ama kaadh lagu galo jano ama dammaanad qaad nololeed; laakiinse waxa weeyi xidhiidh rumaysad ku dhisan oo koraya. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 2:40.

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Soo koob wacdintii Butros
2. Maxay ahayd ujeeddada Bentakostigu?
3. Sidee ayay waxsii sheegista Yoo'eel uula xidhiidhaa arrintan?

Qeex adeegsiga Butros uu adeegsaday qoraallada Axdiga Hore.

FALIMAHA RASUULLADA 3

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Nin Curyaanimo ku dhashay oo lagu bogsiiyay Macbadka albaabkiisa	Curyaankii waa la bogsiiyay	Bogsiintii albaabka qurxoon agtiisa	Curyaan dawarsade ah baa la bogsiiyay	Daawaynta ninkii curyaanka ahaa
3:1-10	3:1-10	3:1-10	3:1-10	3:1-10
Butros oo ka Balbaladii Sulaymaan ka dhex hadlay	Wacdintii Balbalada Sulaymaan dhexdeeda	Wacdintii Butros	Fariintii Butros ee Macbadka dhexdiisa	Khudbaddii Butros u jeediyay dadka
3:11-26	3:11-26	3:11-16	3:11-16	3:11-16
		3:17-26	3:17-26	3:17-24
				3:25-26

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDEEDA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

Cutubyada 3-5 waxa jirta dareen Yeruusaalem ka hiray oo ku saabsanaa waxbarista Ciise iyo mucjisooyinkii Rasuullada. Wakhtiga saddexda cutub ee ugu horreeyaana waa ilaa hal sanno.

- A. Butros iyo Yooxanaa waxay bogsiiyeen curyaan, 3:1-4:31 (tusaalaha Fal 2:43)
 1. bogsiinta lafteeda
 2. wacdintii labaad ee Butros oo sharraxaysa bogsiita.
 3. ka jawaab celintii (wacdinta Butros ee saddexaad, oo la siiyay Senhadriinka)
 4. silcintii oo bilaabantay

- B. Isku dayista wada noolaanshaha, Fal 4:32-5:11
 - 1. midnimaduu ugu horraysay ee rumaystayaasha (tusaalaha Fal 2:43-47)
 - 2. dhibaatooyinkii Ananiyaas iyo Sapphira
- C. Xidhiidhkii ka dhexeeyay kaniisaddii ugu horraysay iyo rabbaaniyiintii Yuhuudda, 5:12-42
 - 1. nolosha kaniisadda
 - 2. hinaasitaankii Senhadriinka
 - 3. malag soo dhex galay
 - 4. wacdintii Butros ee afraad
 - 5. ka jawaab celin iyo ciqaabitaan

MAGACYADA CIISE EE KU SUGAN CUTUBYADA 3-4

- A. Ciise Masiixii reer Naaseret, 3:6; 4:10.
- B. Adeegihiisa Ciise, 3:13,26; 4:27.
- C. Kan Xaqa iyo Quduuska ah, 3:14 (cf. 2:27)
- D. Amiirka Nolosha, 3:15.
- E. Masiixa, 3:18,20; 4:10 (cf. “Rabbi iyo Masiix,” 2:36)
- F. Nebi, 3:22.
- G. Waxa suuro gala si dadban u tahay “Faraca Ibraahim,” 3:25-26
- H. The Madaxa rukunka, 4:11.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 3:1-10

¹Haddaba saacaddii sagaalaad oo wakhtigii salaadda ah ayaa Butros iyo Yooxanaa macbudka tageen. ²Waxaa la soo qaaday nin curyaannimo uurkii hooyadiis kala soo baxay oo maalin walba la ag dhigi jiray albaabka macbudka oo la odhan jiray Qurux Badane inuu kuwa macbudka gelayay dawersado. ³Isagu, markuu arkay Butros iyo Yooxanaa oo ku dhow inay macbudka galaan. ayuu dawersaday iyaga. ⁴Markaasaa Butros, oo Yooxanaa la socdo. intuu aad u fiiriyey isaga, ku yidhi, Na soo eeg. ⁵Markaasuu u fiirsaday iyaga. isagoo filanaya inuu iyaga wax ka helo. ⁶laakiin Butros baa ku yidhi, Lacag iyo dahab midna ma haysto, laakiin waxaan haystaan ku siinayaa. Magaca Ciise Masiix, kii reer Naasaret, ku socio. ⁷Markaasuu intuu gacanta midigtaa ku dhegay ayuu sara kiciyey; oo markiiba cagihisii iyo anqowyadiisiiiba waa xoogaysteen. ⁸Intuu kor u booday ayuu istaagay oo socod bilaabay; markaasuu iyaga macbudkii la galay. isagoo socda oo boodboodaya oo Ilaah ammaanaya. ⁹Dadkii oo dhammuna waxay arkeen isagoo socda oo Ilaah ammaanaya; ¹⁰markaasay waxay garteen inuu isagu yahay kii Albaabkii Quruxda Badnaa agtiisa dawersiga u fadhiisan jiray; markaasay yaab iyo amakaag ula dhinteen wixii ku dhacay isaga.

3:1 “Butros iyo Yooxanaa macbudka tageen” waa fal aan ebyan ahayn oo wax tusmayanaya. Waxa dabecad u ahayd xertii hore oodhan in ay tagaan Macbadka maalin kasta (cf. Luukos 24:53; Fal 2:46). Asal ahaan kuwii Ciise ku dhex raacay Falastiin waxa ay caabudaadda ku samayn jireen:

- 1. Macbadka dhexdiisa (ugu yaraan maalmo khaas ah haddii aanay ahayn maalin kasta)
- 2. Sinagoogyada dhexdooda (Sabti kasta)
- 3. Waxay la samayn jireen rumaystayaasha maalinta Axadda

Middani waxa ay tusaale u ahayd wakhti dheer waxaanay rumaystayaasha arkeen inaanay qaybsanaanin dhex oollin rumaysadkooda ay rumaysan yihiin Masiixa la ballan qaaday iyo diinta Yuhuudda. Waxa ay isu arkeen inay yihiin “dadka Israa’iil.” Taasi waa sababta ay kooxdooda ugu doorteen magaca *ekklesia*. Sebtuujantiga dhexdiisa middani waxay la mid tahay sida ay ka dhignayd erayga axdiga ku dhisan “urur diimeedka (*qahal*) Israa’iil” loo tarjumay.

Yuhuuddu waxay waxqabad gaar ah sameeyeen kaddib dhicitaankii Yerusaaalem waxaanay sameeyeen qaacido dhaar ah (diidmada inuu Ciise yahay Masiixa) si loo adkeeyo xubinimada sinagoogyada gudaha. Tani

waxa ay ahayd markii kaniisaddu ay maalintooda cibaadada u bedesheen Axadda (maalintaa xasuusashada sarakicistii Ciise; maalintaa uu Ciise saddex jeer u muuqday xerta iyaga oo ku sugan Qolladda Sare).

Yooxanaa waxa lagu lifaaqay inuu Butros la socday sida ku sugan Falimaha Rasuullada (cf. 1:13; 3:1,3,4,11; 4:13,19; 8:14). Waxa suurto gal ah in kasniisaddii hore ee Yeruusaalem ay lahayd kooxo hoggaamiyayaal ah kuwaasi oo metelayay faafinta injiilka. Waxaana suurto gal ah in Butros iyo Yooxanaa ay aad ugu furfurnaayeen wacdinta kuwa aan ahayn Yuhuudda (aayadaha 8, 10), halka Yacquub (Ciise walaalkiis xagga hooyo) badanaa lagu sheegay Yuhuudda asal raaca ah. Waxyaalahan oo dhamina waxay is beddeleen kaddib Gudigii Yeruusaalem ee Falimaha Rasuullada 15.

▣ **“saacaddii sagaalaaad oo wakhtigii salaadda ah”** middani waxa ay tilmaamaysaa sagaal saacadood dabadeed cadceed soo baxa. Yuhuuddu (Farrisiinta) dhaqan ahaan waxay tukan jireen maalin kasta 9 subaxnimo, 12 duhurnimo, iyo 3 galabnimo (waxa suurto gala in lagu saleeyay Sabuurka 55:17). Qoraalkanina waxa uu sheegayaa wakhtiga fiidka ee qurbaanka, kaasoo ahaa 3 galabnimo (qurbaan bixinta subaxu waxa uu ahaa 9 subaxnimo). Wakhtigan oo kalana waxa macbadka joogay dad badan (10:30).

3:2 “nin curyaannimo uurkii hooyadiis kala soo baxay” dhammaanba kuwii sida joogtada u soo xaadiri jiray Macbadku waxay garanayeen xaaladda uu ninkani ku sugnaa (“si joogto ah baa loo qaadi jiray” waa fal aan ebyan ahayn); sidaasi darteedna, may jirin khiyaano lagu samayn karay bogsiintan (cf 3:10; 4:22). Tani waxa ay ahayd dhammaystirka waxsii sheegista Axdiga Hore ee ku saabsan Masiixa (Ishacyaah 35:6). Yuhuuddu waxa ay dooneen calaamad; Ciisena kuwo badan ayuu siiyay, iminkana midkale ayay haystaan haddii indhohoodu furan yihiin.

Halkan waxa ku sugan arrin laga yaabo oo ah nin xanuunsanaya oo si joogto ah u dhex joogay guriga Ilaah. Sida xaqiiqadu ahaydna waxa jirtay in dadka noocan oo kale ah laga mamnuuci jiray ka qayb qaadashada caabudaadda (i.e., adeegga sidii wadaadnimo, cf. Laawiyiintii. 21:16-24). Injiilku waxa uu keenayaa maalin cusub, xitaa Ethiopian (cirqi la’aan) ayaa lagusoo dhoweeyay boqortooyada cusub (cf. 8:26-40).

▣ **“albaabka macbudka oo la odhan jiray Qurux Badane”** meesha dhabta ah ee albaabkan lama hubo. Waxaana suurto gal ah inay ahayd Albaabka Nikanor ka ee laga sameeyay macdan ka ahaatay Korintos (Flavius Josephus, *Antiq.* 15.11.3; *Wars* 5.5.3). Waxa lagasoo kexeeyay Maxkamadda kuwa aan Yuhuudda ahayn iyadoo la keenay Maxkamadda Haweenka. Waxaanay ku taallay dhinaca bari ee macbadka, una jeedda Buur Saytuun, kuna dhow Balbalada Sulaymaan.

▣ **“inuu kuwa macbudka gelayay dawersado”** Sadaqad bixinta ama kuwa saboolka ah oo wax la siiyo, waxa ay qayb ka ahayd rumaysadka Yuhuudda (cf. Matayos. 6:1-4; Luukos 11:41; 12:33; Fal 10:2,4,31; 24:17). Hadiyo goor lacagta waxa la ururin jiray usbuuciiba hal mar kaddibna waxa la qaybin jiray cuntada, laakiinse waxa intaas dheeraa iyadoo maalin kasta ay qaar ka dawarsan jireen Macbadka agtiisa.

MAWDUUC GAAR AH: SADAQAD BIXINTA

- I. Ereyga laftiisa
 - A. Eraygani wuxuu ka dhex yimid Yuhuudda (i.e., wakhtiga Sebdujantiga).
 - B. waxa uu tilmaamayaa wax siinta dadka baahiyaysan
 - C. Erayga Ingiriisida ah ee almasgiving, waxa uu ka yimid erayga Giriigga ah ee *ele‘mosune*.
- II. Fikradda Axdiga Hore
 - A. Gacan siinta dadka baahiyaysan waxa lagu sheegay Tawreed
 1. macne la nooc ah, Sharciga Kunoqoshadiisa. 15:7-11
 2. “soo ururin,” iyadoo qayb looga tegayo dadka saboolka ah, Laawiyiintii. 19:9; 23:22; Sharciga Kunoqoshadiisa. 24:20
 3. “sanad sabtiyeedka,” iyadoo saboolka loo ogolanayo waxa soo go’a sannadka toddobaad, Baxniintii. 23:10-11; Laawiyiintii. 25:2-7.
 - B. Waxa fikirkan lagu horu mariyay Qoraallada Xikmadda (tusaalayaal la doortay)
 1. Ayuub 5:8-16; 29:12-17 (xumaanta lagu sheegay, 24:1-12)

2. Sabuurrada, 11:7
3. Maahmaahyadii 11:4; 14:21,31; 16:6; 21:3,13

III. Horumarista Yuhuudda dhexdeeda

- A. Qaybta ugu horraysa ee Mishnah waxa ay ka hadlaysaa sida loola dhaqmo dadka baahiyaysan iyo dadka Laawiyiinta ah.
- B. Xigashooyin lasoo doortay
 1. Ecclesiasticus 3:30, “sida biyuhu dabka u bakhtiiyaan, ayaa sadaqadduna u tirtirtaa denbiga” (NRSV)
 2. Ecclesiasticus 29:12, “qasnaddiina ku darsada sadaqad bixinta waxaanay idinka badbaadin doontaa halaagga” (NRSV)
 3. Tobit 4:6-11, “kuwa ku socda xaqiiqadu shuqulladooda oo dhan way ku barwaaqoobi doonaan. Oo kuwa ku socda xaqnimadaw 7 maalkiinna wax ka bixiya, oo indhahana ha lasii raacina waxa aad bixisaan. Ha ka jeedsanina ku kasta oo sabool ah, oo idinkana Ilaah idinkama jeedsan doono. 8 haddii aad leedihiin hanti badan, qayb kasta wax ka bixiya; haddii ay yartahayna, ha ka cabsanina waxa yareed haysaan inaad wax ka bixisaan. 9 waayo waxaad qasnad u dhiganaysaan maalinta baahida. 10 Oo sadaqad bixintu waxay idinka badbaadinaysaa dhimashada, waxaanay idinka dhowraysaa inaad ku socotaan mugdiga. 11 hubaashii, sadaqad bixintu kuwa ku dhaqma waxay deeq wanaagsan ugu tahay joogitaanka Kan Ugusarreeya.” (NRSV).
 4. Tobit 12:8-9, “8 salaadda iyo soonku way fiicanyihiin, laakiin labadaba waxa ka wanaagsan sadaqad bixinta ay ku dheehantahay xaqnimada. Hanti yaraan xaqnimo lihi waxay ka fiicantahay hodantinimo camal xumo leh. Sadaqad oo la bixiyaa waxay ka fiicantahay dahab oo la kaydsado. 9 waayo sadaqad bixinta waxay ka badbaadisaa dhimashada iyadoo denbigana tirtirta. Kuwa sadaqadda bixiyaa waxay ku farxi doonaan nolol buuxda.” (NRSV)
- C. Xigashada ugu danbaysa ee ka ahaatay Tobit 12:8-9 waxay tusinaysaa dhibaataadada horumayraysa. Carmallada aadanaha ayaa waxa loo arkayay inay tahay midda lagu helayo cafiska ama dembidhaafka. Fikraddanina waxa ay si dheeraada ugu horumartay Sebtuujanita dhexdiisa halkaasoo erayga Giriigga ah ee “sadaqadbixintu” (*elemosun*) uu noqday mid la mida “xaqnimada” (*dikaaiosunē*). Waxa ay beddeli karaan labaduba tarjumaadda Cibraaniga ee “xaqnimo” (BDB 842, axdiga Ilaah ee jacaylka iyo daacadnimada ah, cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 6:25; 24:13; Ishacyaah. 1:27; 28:17; 59:16; Daanyeel. 4:27).
- D. Aadanaha camalladooda naxariista ah ayaa waxa ay noqonayaan arrinta uu qof ku heli karo dembidhaafka iyo ka badbaadada dhimashada. Camalka laftiisu, halkii laga eegi lahaa ujeedada camalka ka dambaysa, ayaa waxa uu noqday fahan ahaan mid muhiim ah. Ilaah waxa uu eegaa qalbiyada, kaddibna waxa uu xukumaa waxa gacantu samayso. Middani waxay ahayd waxbarista rabbaaniyiinta, laakiin haddana dhinac ayaa waxa ay uugu luntay xaq iska dhigista shakhsi ahaaneed (Miikaah 6:8).

IV. Axdiga Cusubi wuxuu ka yidhi

- A. Eraygan waxa laga helayaa
 1. Matayos. 6:1-4
 2. Luukos 11:41; 12:33
 3. Fal 3:2-3,10; 10:2,4,31; 24:17
- B. Ciise fahankan dhaqan ahaaneed ee xaqnimada waxa uu uga hadlayaa (cf. II Clement 16:4)
 1. sadaqad bixin
 2. soon
 3. salaad
- C. Wacdintii Ciise ee Buurta dhusheeda (Matayos 5-7), kuwo Yuhuudda ka mid ahi waxay ku kalsoonaayeen camalladooda. Camallada waxa loogala jeedaa raacitaanka jacaylka Ilaah, eraygiisa iyo axdigiisa, mana aha walaalayaal dan gaar ah ama xaq iska dhigis. Is hoosaysiinta iyo is qarinta ayaa ah camalka wanaagsan. Muhiimadduna waa qalbiga. Qalbigana wax ku jirta xumaan, waxaana beddela Ilaah oo qalbiga cusubina Ilaah ayuu u hoggaansamaa!

3:3 ninka ujeedadiisu waxay ahayd oo keliya inuu helo lacag (aayadda 5).

3:4 “intuu aad u fiiriyey isaga” eeg fiirada 1:10.

▣ “Na soo eeg” waxa ay rabeen dareenkiisa oon qaybsanayn meel kalena eegayn (*blepō* waa fal amar ah).

3:5 Rasuulladu may ahayn kuwo hantiilayaal ah, laakiinse waxay hayeen ilaha ruuxiga ah ee Ilaah (aayadda 6).

3:6 “Magaca Ciise Masiix” “Magac” xagga Cibraaniyada waxa uu ka hadlayaa qofka dabeecaddiisa (cf. Luukos 9:48,49; 10:17; 21:12,17; 24:47, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:21). Waxa ay middani ninka ku noqonaysay wax la yaableh. Ciise dhowaanbaa la xukumay oo isku tallaabta lagu qodbay sidii isagoo denbiile ah, haddaba ninkan layaabkal lihi (Butros) yuu ugu yeedhayaa “Masiixa” (“Masiixa,” oo ah tarjumaadda Giriigga, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:31).

▣ “kii reer Naasaret” eeg Mawduuca Gaarka ah 2:22.

▣ “ku soco” waa fal wakhti xaadirka jooga oo amar ah. Butros iyo Yooxanaa, sidii Ciise oo kale ayaa ay adeegsanayaan jaaniskan la kulmayo si ay u tusiyaan jacaylka iyo awoodda Ilaah taasi oo caddayn ama ansixin u ah farriinta injiilka (aayadda 9). Bogsiintanina waxa ay soo jiidatay indhaha caabudayaashi Yuhuudda ahaa (aayadda 12ff).

3:7 tani waa dhacdo uu diiwaan geliyay markhaati goob joog ah oo sidoo kalena xaadir u ahaa dhacdooyin kale oo la mid ah. Qof halkaas joogay ayaa Luukos u sheegay wax ku saabsan arrintan iyadoo faahfaahsan.

▣ “oo markiiba” middani waa erayga Giriigga ah ee *parachrēma*. Luukosna waxa uu Injiilkiisa ku dhex adeegsanayaa toban jeer halka uu Falimaha Rasuulladana kaga adeegsanayo lix jeer (cf. 3:7; 5:10; 12:23; 13:11; 16:26,33). Labo jeer oo keliya ayaa lagu dhex adeegsaday Matayos meelkalena lagagama adeegsanin Axdiga Cusub dhexdiisa. Marar badan ayaana lagu adeegsaday Sebtuujiangiga. Haddaba Luukos waxa uu adeegsanayaa ereyo Giriigga oo lagasoo tarjumay Cibraani badanaa. Waxa markaa uu si fiican u yaqaanay Axdiga Hore, waxaana laga yaabaa in taasi ay uugu suuro gashay xidhiidhkii uu la lahaa Rasuul Bawlos ama xidhiidhkii uu la lahaa rumaystayaashii cusbaa.

3:8 “Intuu kor u booday ayuu istaagay” waa fal wakhti xaadirkaas taagan (aayadda 9). Ninkani waxa uu bilaabay inuu socdo oo ku warwareego Macbadka. Waana jaanis wanaagsan oo ah wadaagista Warka Wanaagsan!

3:10 Way yaqaaneen ninkan (falaan ebyan ahayn oo wax tusmaynaya, waxaanay bilaabeen inay isaga aqoonsadaan). Isagu muu ahayn nin qariib ah ama booqde, maalin walbana waxay ku arki jireen albaabka iyagoo kusii dhaafi jiray! Si kastaba ha ahaatee, kuwii Ciise metalayay may dhaafin isaga, waxaanay sameeyeen awooddii Bentakostiga.

▣ “waxa ka buuxsamay” Luukos badanaa wuu adeegsanayaa middan (eeg fiirada 5:17). Aadanahana waxa ka buuxsami kara waxyaalo badan.

1. Ruuxa Quduuska ah, Luukos 1:15,41,67; Fal 2:4; 4:8,31; 9:17; 13:9
2. cadho, Luukos 4:28; 6:11
3. cabsi, Luukos 5:26
4. layaab, Fal 3:10
5. jealousy, Acts 5:17; 13:45
6. wareer, Fal 19:29

Butros iyo Yooxanaa waxay rabeen kuwan yaabay (waxa uu soo jiidatay dareenkooda) si ay uuga buuxsamaan injiilka!

▣ “yaab iyo amakaag” waxyaalahani sidoo kale guud ahaan waxay ka muuqanayaan qoraallada Luukos.

1. yaab, *thambos*, Luukos 3:6; 5:9; Fal 3:10 iyo *ekthambos* sida ku sugan 3:11
2. amazement
 - a. *ekstasis*, Luukos 5:26; Fal 3:10; 10:10; 11:5; 22:17
 - b. *exist'emi*, Luukos 2:47; 8:56; 24:22; Fal 2:7,12; 8:9,11; 9:21; 10:45; 12:16

Jacaylka Ilaah iyo shuqulladiisu waxa ay keenaan layaab (eraygan Giriigga ah waxa loogu adeegsaday Sebteuujantiga cabsi iyo tixgelinta Ilaah, cf. Bilowgii. 15:12; Baxniintii. 23:27; Sharciga Kunoqoshadiisa. 28:28).

NASB (UPDATED) TEXT: 3:11-16

¹¹Oo intuu Butros iyo Yooxanaa ku dhegganaa ayay dadkii oo dhammu ku soo wada ordeen balbaladii la odhan jiray Balbaladii Sulaymaan iyagoo aad u yaabsan. ¹²Markuu Butros dadkii arkay ayuu u jawaabay oo ku yidhi, Niman yahow reer bini Israa'iil, Maxaad waxan ula yaabsan tihiin, ama maxaad sidaas noogu fiirinaysaan sidii annagoo xooggayaga ama cibaadadayada ku socodsiinnay isaga? ¹³Ilaaha Ibraahim iyo Isxaaq iyo Yacquub, oo ahaa Ilaaha awowayaasheen, wuxuu ammaanay Midiidinkiisii Ciise, kii aad gacan geliseen oo aad Bilaatos hortiiisa ku dafirteen markuu goostay inuu sii daayo. ¹⁴laakiin idinku waxaad dafirteen Kan Qoduska iyo Xaqaba ah, oo waxaad weydiisateen nin dhiig qaba in laydiin sii daayo, ¹⁵oo waxaad disheen Amiirkii nolosha, kan Ilaah ka sare kiciyey kuwii dhintay, annaguna markhaatiyaal baannu ka nahay. ¹⁶Magiciisa ayaa xoogsiiyey kan aad arkaysaan oo garanaysaan, rumaysadka uu magiciisa ku rumaystay aawadiis. Rumaysadka uu ku rumaystay isaga ayaa ninkan idinka oo dhan hortiiinna ku siiyey caafimaadkan.

3:11 “Oo intuu Butros iyo Yooxanaa ku dhegganaa” waa fal wakhti xaadirka jooga oo shaqaynaya. Waxa aan qiyaasi karaa isaga oo ku dhegsan Butros sidii Maryanba ay Ciise uugu dhegtay beerta dhexdeeda (cf. Yooxanaa 20:16-17).

▣ **“Balbaladii Sulaymaan”** waxa ay ahayd goob dedan oo u dhow maxkamadda kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. Josephus’ *Antiq.*20.9.7). Saqafkana waxa hayay tiirar badan, waxaanay magaca ka heshay aasaaskii gaboobay ee macbadkii Sulaymaan oo isla goobtaas ku taallay. Hadiyo goorna Ciise halkaas ayuu wax ka bari jiray (Yooxanaa 10:23).

3:12 “Markuu Butros dadkii arkay” waxa ay arkeen layaabka iyo dadkan isu soo ururay waanay ka faa’idaysteen (cf. Kolosay. 4:3; II Timoteyos. 4:2) si ay uula wadaagaan injiilka (wacdintii labaad ee kaniisadda cusub).

▣ **“Niman yahow reer bini Israa'iil”** Butros waxa uu iyaga sidanoo kale uugu yeeday 2:22, waxaanu ilaa hadda Butros la hadlayaa Yuhuudda.

▣ **“maxaad...maxaad”** Butros waxa uu waydiiyay sababta ay uuga yaabayaan bogsiinta mucjisada ah. Miyaanu Ciise mucjisooyinka noocan ah samaynin intii lagu jiray usbuuc ugu danbeeyay noloshiisa? Sidoo kale, maxay Butros iyo Yooxanaa ka eegayaan iyagoo la yaabban waxa ay sameeyeen? Tani waxa ahayd calaamadda tusinaysa in la isku hallayn karo injiilka iyo awoodda Masiixa la sara kiciyay.

Ruuxu mucjisooyinkan wuxuu u sameeyay sababo dhow rah.

1. inuu ansixiyo hoggaaminta Butros iyo Yooxanaa
2. inuu caawiyo ninkan baahan
3. inuu u markhaati furo Yuhuudda ku sugan Macbadka.

3:13 “Ilaaha Ibraahim iyo Isxaaq iyo Yacquub” middani waxay tusinaysaa in Ciise shaqadiisa iyo injiilku ay la xidhiidhaan Axdiga Ilaah iyo Axdiga dadka Axdiga Hore (cf. Baxniintii. 3:6,15; Luukos 20:37).

Masiixiyadda waa in lagu saleeyo iyadoo ah dhammaystirka runta ah ee diinta Yuhuudda (cf. Matayos. 5:17-19). Yuhuud badani waxay u arkayaan wax la bedelay, laakiin Axdiga Cusub qorayaashiisu waxay u arkayaan dhammaystirka. Kuwa Ciise raacayna waa midhaha la ballan qaaday ee “axdiga cusub” ee Yeremyaah. 31:31-34

(cf. Galatiya. 6:16). Israa'iil may buuxinin shaqadii la siiyay ee ahayd boqortooyada wadaadada ee dunida (cf. Baxniintii. 19:5-6; I Butros. 2:5,9; Muujintii. 1:6). Kaniisadda ayaana la siiyay awoodda (cf. Matayos. 28:18-20; Luukos 24:46-47; Fal 1:8). Ujeeddada Ilaah waa dib usoo celinta aadanaha uu ka sameeyay ekaanshihiisa, sidaasi darteedna taasi waa ujeeddadiisa ugu horraysa oo ah is weheshigu in la dhammaystiro. Haddii uu jiro Ilaah keli ahi (tawxiidka, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:39), markaas ma jiri doonaan dad gaar ahi, balse waxa jiri doona adeegayaal u adeega Ilaah iyagoo ujeeddadiisa uu dunida ka rabona ku soconaya (eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8).

▣ **“wuxuu ammaanay”** ereyadan waxa loo fahmi karaa siyaabo dhowr ah.

1. waxa ay ku timid bogsiinta ninka curyaanka ahi waxa weeyi Magaciisa
2. macnaha fog ee ku jira wacdinta Butros waa Ciise oo la sara kiciyay isla markaasna la ammaanay
3. h Axdiga Hore macnaha ku jira oo tusinaya Ciise oo ah Masiixa imanaya
4. Injiilka Yooxanaa dhexdiisa waxa eraygan uu Ciise u adeegsaday naftiisa ama iskutallaab ku qodbitaankiisa (cf. 7:39; 12:10,23; 13:31-32; 16:14; 17:1).

MAWDUUC GAAR AH: AMMAAN (DOXA)

Fikradda Kitaabka Quduuska ee “ammaantu” waa mid ay adag tahay in la qeexo. Ammaanta Masiixiyiintu waxa weeyi fahanka injiilka iyo inay Ilaah ammaanaan, balse maaha nafhooda (1:29-31; Yeremyaah 9:23-24).

Axdiga Hore dhexdiisa erayada caanka ah ee loo adeegsado “ammaanta” (*kbd* BDB 217) waxay ahaayeen kuwo ganacsi oo la xidhiidhi jiray miisaanka. Oo miisaanka culayska leh ayaa ahaa wax qiimo badan. Waxa kaloo eraygan loo adeegsaday tilmaamitaanka sharafta Ilaah (Baxniintii 19:16-18; 24:17; Ishacyaah 60:1-2). Isaga oo keliya ayaa wanaagsan oo sharafna mudan. Wuxuu dhowraa oo tix geliyaa aadanahan xad gudbay (Baxniintii 33:17-23; Ishacyaah 6:5). Ilaahna waxa lagu aqoonsan karaa oo keliya Masiixa (cf. Yooxanaa 12:45; 14:8-11; Kolosay.1:15; Cibraaniyada. 1:3).

Erayga “ammaan” waxa laga yaabaa inuu.

1. 1 la siinnaa karo “xaqnimada Ilaah”
2. 2 waxa kaloo laga yaabaa inay tilmaamayso raalli ahaanshaha Ilaah
3. Waxa iyana laga yaabaa inay tilmaamayso ekaanshaha Ilaah ee laga sameeyay aadanaha (Bilowgii 1:26-27; 5:1; 9:6), iyagoo markii danbana Ilaah caasiyay (Bilowgii 3:1-22), Haddaba, eraygan waxa ugu horrayn loo adeegsaday markuu Ilaah la joogay dadkiisa duurka (Baxniintii 16:7,10; Laawiyiintii 9:23; Tirintii 14:10).

▣ **“Midiidinkiisii”** ereyga “Midiidin” (*pais* waxa si joogto ah loogu adeegsaday LXX)

1. magac sharafeed Axdiga Cusub dhexdiisa loogu adeegsaday Yacquub, Muuse, Yshuuca, iyo Daa'uud (cf. Sabuurka 105; Luukos 1:69)
2. Ammaanta Midiidinka ee Ishacyaah (i.e., 42:1-5; 49:1-7; 50:4-11; 52:13-53:12)
3. ummadda Israa'iil (cf. 41:8-9; 42:19; 43:10; 44:1,21; sidoo kale LXX oo laga arkayo Luukos 1:54)
4. Masiixa Ilaah (cf. 42:1; 52:13; 53:11)
5. *Pais* waxa loo adeegsaday Ciise oo ah Midiidinka/Masiixa sida ku sugan Fal 3:13,26; 4:27,30

Halkaasna kuma cadda kala saarista iskaashiga iyo dhinaca kelida ah, gaar ahaan Gabayga ugu danbeeya (i.e., Ishacyaah. 52:13-53:12). Macnuhuna ma toosinayo Israa'iil.

1. ummaddu ma noqon kara ka bilaa denbiga ah ee keenaya cafiska maxaayeelay waxay mutaysteen xukunka (cf. Ishacyaah. 41:18-22; 53:8d).
2. Sebtuujentigu wuxuu “adiga” sida ku sugan Ishacyaah. 52:14 u beddelayaa “Isaga” (sidoo kale aayadda. 15). Tarjumayaashii Yuhuudda ee dhalashadii Ciise ka hor (suuro gal ahaan 250-150 C.H.) waxay qoraalkan u arkeen inuu sheegayo Masiixa keli ahaan.

▣ **“Ciise”** Marka maga Ciise kelidiis la adeegsado, waxa uu caadi ahaan tusinayaa aadananimadiisa (aayadda 6).

▣ “**kii aad gacan geliseen ood dafirteen**” “idinku” waa adkayn! Looma adeegsan oo keliya hoggaamiyayaasha Yuhuudda oo ka masuul ahyaa dhimashadii Ciise (cf. aayadaha. 17; 2:23). Butros waxa uu si gaara ugu noqonayaa dadkii badnaa ee u jawaabayay Bilaatos (cf. Luukos 23:18-25). Waxaana suurto gal ah kuwo ka mida ahaa kuwaasi inay jooheen halkaas, laakiin Butros waxa uu dadkan uula hadlayaa sidii oo ay arrintan koox ahaan uga wada masuul ahaayeen (aayadda 15). Dadka Ilaah uu doortay (Yuhuud) ayaa “gacan geliyay” oo “dafiray” Masiixa Ilaah (cf. Yooxanaa 1:11).

▣ “**Bilaatos**” eeg Mawduucan Gaark ah.

MAWDUUC GAAR AH: BONTIYAS BILAATOS

I. Ninka

- A. Meesha uu ku dhashay iyo taariikhda la garan maayo
- B. Waxa uu ka mid ahaa dabaqaddii dhexe ee Istuqraadiga
- C. Xaas buu lahaa, laga yaabaa inuu bilaa carruur ahaa
- D. Mansbayadii uu hore u qabtay lagaran mayo

II. Shakhsiyaddiisa

A. Labo aragtiyood oo kala duwan

1. Wuxuu ka dhigayaa Faylo (*Legatio and Gaium*, 299-305) iyo Josephus (*Antiq*, 18.3.1 iyo *Jewish Wars* 2.9.2-4), inuu ahaa nin digtaytor ah oo bilaa naxariisa.
2. Axdiga Cusub (Injiillada iyo Falimaha Rasuullada) wuxuu ka dhigayaa inuu ahaa nin jilicsan oo lagu ciyaari karayay

B. Paul Barnett, *Jesus and the Rise of Early Christianity*, wuxuu ku muujinayaa tafsiirka lagu qanci karo ee labadan aragtiyood

1. Bilaatos muu magacaabin Tiberiyas kii Yuhuudda taageeri jiray sanadkii 26 C.D. (philo, *Legatio and Gaium*, 160-161), balse waxa magacaabay la taliyihii Tiberiyas oo ahaa Sejanus, oo necbaa Yuhuudda.
2. Tiberiyas waxa uu ka cabsanayay isagoo awooddiisii siyaasadeed u gacan gashay Sejanus oo Yuhuudda necbaa isla markaana dhaxli rabay kursiga (Philo, *Legatio land Gaium*, 159-160).
3. Bilatoos waxa uu daacad u ahaa Sejanus oo uu isku dayi jiray inuu ku raalli geliyo
 - a. Keenista calaamadihii ilaahyada Roomaanka Yeruusaalem dhexdeeda (C.H. 26) taasina Yuhuudda waxay ku sababaysay inay ka cadhoodaan (Josephus kitaabkiisa *Antiq*. 18.3.1; *Jewish Wars* 2.9.2-3).
 - b. Dhaqan gelinta lacagii Roomaanka (C.D. 29-31) oo ay ku sawirnaayeen waxyaabaha Roomaanku caabudaan. Josephus ayaana sheegaya inuu Bilaatos rabay bedelitaanka shareecada iyo dhaqanka Yuhuudda ((Josephus, *Antiq*. 18.4.1-2)
 - c. In dhaqaale laga helo khasnadda Macbadka si mashruucyo looga dhiso Yeruusaalem (Josephus, *Antiq*. 18.3.2; *Jewish Wars* 2.9.3).
 - d. Waxa uu laayey kuwo ka mid ahaa reer Galiili oo qurbaan ku samaynayay Yeruusaalem (Luukos 13:12).
 - e. Waxa uu Yeruusaalem keenay dhufaysyadii Roomaanka C.H. 31. Arrintaasna waxa kasoo horjeestay wiilkii Herodskii Waynaa, sidaasi darteedna Tiberiyas wuxuu soo saaray amar dhufaysyada dib loogusoo celinayo Qaysariya (Philo, *Legation and gaium*, 299-305).
 - f. Kuwo badan oo reer Samaariya ah ayuu ku dul laayey Buur Gerisim (C.D. 36/37) iyagoo raadinaya waxyaabo muqadas u ah diintooda, taasina waxa ay Bilaatos masuulkiisii (Vitellius, taliyihii Siiriya) ku sababtay inuu isaga xilka ka qaado una diro Rooma (Josephus, *Antiq*. 18.4.1-2).
4. Sejanus waxa dil lagu fuliyay sanadkii C.D. 31 iyadoo kaddibna Tiberiyaas uu soo ceshaday

awooddiisii siyaasadeed oo buuxda, sidaasi darteedna, Bilatos waxa uu sameeyay #a, b, c isagoo raadinayay kalsoonida Sejanus; halka #e iyo f uu iskaga deyyay inuu ku raalli geliyo kalsoonida Tiberiyas, laakiinse ugu dambayntii may anficiin isaga.

5. Waxa muuqata markaa Tiberiyas oo awooddii siyaasaddiisa soo ceshaday, isla markaana u diray badhisaabyada farrin ah inay Yuhuudda si fiican ula macaamaloodaan (Philo, *Legatio and Gaium*, 160-161), taasi hoggaamiyayaasha Yuhuudda waxay u suuro gelisay inay ka faa'idaystaan jilayca Bilatos oo ku dheel dheelaan, si ay Ciise isku tallaabta ugu qodbaan. Haddaba aragtidan ayaa xallinaysa khilaafka u dhexeeya labada aragtiyood.

III. Halkuu ku danbeeyay

- A. Waxa loogu yeedhay Rooma ka hor waxyaruu dhimashadii Tiberiyas (C.D. 37).
- B. Meel kale looma magacaabin
- C. Intaas kaddib, noloshiisa wax badan kama garanayno.

▣ “markuu goostay inuu sii daayo” waxa ay middani u noqonaysaa Luukos 23:4,14,22, halkaaso Bilaatos saddex jeer ku yidhi “wax denbiya kuma helin Isaga,” isagoo sidoo kalena saddex jeer isku dayay inuu siidaayo Isaga (cf. Luukos 23:16,20,22). Culimo badan ayaa rumaysan in Falimaha Rasuullada loo qoray si loo tusiyo in siraakiisha Roomaanku aanay Ciise ku helin wax eedayn ah. Bilaatos waxa qasbay Yuhuudda hoggaankoodii iyagoo ku qasbay inuu sameeyo wax aanu isagu rabin samaynteeda.

3:14 “Kan Qoduuska iyo Xaqaba ah” waxa ay middani si cad u tusinaysaa Ciise oo ahaa bilaa denbi. Maxkamadayntiisuna waxay ahayd caddaalad darro. Haddaba kani waa magac kale oo Axdiga Hore uu ku magacaabay Masiixa (cf. Ishacyaah. 53:11; Fal 7:52; 22:14; Yooxanaa 6:69). Ruuxyadii jinka ahaa ayaa Ciise ugu yeedhay Kan Quduuska ah ee Ilaah sida ku sugan Markos 1:24; Luukos 4:34. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: KAN QUDUUSKA AH

“Kan Quduuska ah” waxa ay tilmaami kartaa:

1. Ilaaha Aabbaha ah (Axdiga Hore “Kan Quduuska ah ee Israa’iil”)
2. Ilaaha Wiilka ah (Markos 1:24; Luukos 4:34; Yooxanaa 6:69; Falimaha Rasuullada 3:14)
3. Ilaaha Ruuxa ah (“Ruuxa Quduuska ah” Yooxanaa 1:33; 14:26; 20:22).

Falimaha Rasuullada 10:38 ayaa ah aayad lagu sheegay saddexda shakhsiyadood ee Ilaahnimada. Ciise waa la subkay (Luukos 4:18; Falimaha Rasuullada 4:17; 10:38). Halkana waxa aan ka arkaynaa iyadoo fahanka subkistu uu ballaadhanayo oo noqonayo rumaystayaasha oo dhan (1 Yooxanaa 2:27). Kan la subkay waxa uu noqday kuwa la subkay! Waxa ay tani la simantahay kan iyo kuwa ka geesta ah Masiixa (1 Yooxanaa 2:18). Caadi ahaan Axdiga Hore subkitaanku wuxuu ahaa subkitaanka saliidda (Baxniintii 29:7; 30:25; 37:29) iyadoo la xidhiidhay kuwa qabsanayay adeeg gaar ah oo ka ahaaday Ilaah (nebiyada, wadaadada, boqorrada). Erayga “Masiix” ayaa luqada Cibraaniga looga tarjumay “ka la subkay” ama Messiah.

MAWDUUC GAAR AH: XAQNIMADA

“Xaqnimadu” waa mawduuca muhiim u ah ardayga Baybalka baranaya waxaana loo baahan yahay in daraasad shakhsi ahaaneed oo dheeraada qofku uu ku sameeyo mawduucan.

Marka aan eegno Axdiga Hore waxa la tilmaamay ‘caddaalad’ amma ‘xaqnimo’ (BDB 841). Haddaba, Ilaah eraygan waxa uu u adeegsaday inuu ku muujiyo dabiicaddiisa, waayo isagu waa xaakinka caadilka ah ee wax walba qiimeeya. Arrintan haddaba khusaysa xaqnimada Ilaah waxa ay tusinasaa inuu yahay kan sameeya xukunka saxda ah.

Aadanaha waxa laga abuuray ekaanshaha Ilaah (Bilowgii 1:26-27; 5:1,3; 9:6). Sidii kale waxa aadanaha

loo abuuray inay Ilaah la yeeshaan xidhiidh oo la joogaan. Ilaah waxa uu abuuray waxa ugu wayn aadanaha, sidaasi darteedna waxa uu damcay, in iyagu ay Isaga aqoonsadaan, u adeegaan oo jeclaadaan Isaga! Haddaba, waa la tijaabiyay aadanaha bal sida addeecitaankoodu yahay (Bilowgii 3) iyadoo Aadan iyo Xaawana ay ku dhaceen tijaabadaas. Arrintani haddaba waxa ay keentay kala go'itaan ku yimaadda xidhiidhkii u dhexeeyay Ilaah iyo aadanaha (Bilowgii 3; Rooma 5:12-21).

Ilaah haddaba waxa uu ballan qaaday inuu xidhiidhkaas dib usoo nooleeyo (Bilowgii 3:15). Waxaanu sidan ku samaynayaa doonistiisa iyo Isaga oo adeegsanaya Wiilkiisa. Waayo aadanuhu may awoodayn in arrintaas dib u hagaajiyaan (Rooma 1:18-3:20).

Markii aadanuhu danbaabeen, tallaabadii ugu horraysay ee Ilaah qaado isaga oo raba inuu xidhiidhkaas dib u nooleeyo ayaa waxa ay ahayd inuu axdi la dhigto aadanaha, isaga oo markaasna raba inay towbad keenaan oo addeecaan Ilaah. laakiinse way awoodi kari waayeen inay qabtaan wixii laga rabay (Rooma 3:21-31; Galatiya 3). Haddaba, Ilaah waxa uu horeba u lahaa qorshe uu dib ugu soo hagaajinayo axdigii ay jebiyeen aadanuhu, waxaanu arrintaas ku sameeyay sidan:

1. Muujinta aadanaha denbiga miidhan ah oo xaqnimadooda lagu muujiyay shaqadii Masiixa.
2. In si xorriyad leh aadanaha xaqnimo loogu siiyay shaqada Masiixa aawadeed.
3. In lasiiyay Ruuxa keenaya xaqnimada (la midnimada Masiixa, soo celinta muuqaalka Ilaah ee ku sugan aadanaha)
4. dib usoo cusboonaysiinta is weheshigii Beer Ceeden

Si kastaba ha ahaatee, Ilaah waxa uu rabaa jawaab ku dhisan axdi. Ilaah Isaga ayaa wax walba xukuma oo aadanahana quudiyay, laakiinse aadanahuna waa inay arrintaas ka jawaaba celiyaan oo jawaabtoodana si joogta ah u wadaan.

1. Towbad keen
2. Rumaysad
3. Noloshu oo uu ku dheehnaado addeecitaan
4. Qirasho

Xaqnimada haddaba, waa axdiga isku xidhaya ee u dhexeeya Ilaah iyo wuxuu abuuray kuwan ugu sarreeya oo ah aadanaha. Waxa lagu saleeyay dabeecadda Ilaah iyo shaqadii Masiixa iyo Ruuxa oo inoo suurto gelinay inaan samayno xaqnimada, waana in qof waliba shakhsi ahaan uu sida ugu habboon uga jawaaba celiyo. Aragtida lagu magacaabo 'xaqnimada iyo rumaysad.' Waa aragti lagu dhex muujiyay Injiillada, mana aha mid shuruudahan oo kale wadata, laakiinse waxa qeexay Bawlos, oo erayga xaqnimada macnayaashiisa kala gedisan isticmaalaya in kabadan 100 jeer.

Bawlos wuxuu adeegsanayaa eraygan *dikaiosune* oo asal ahaantiisa waxa uu kasoo dhegtay macnaha ay ka samaynaso luqadda Cibraaniyada *SDO* oo ah mid lagu dhex adeegsaday Septuagint ga, oo kama aanu keenin qoraallada Giriigta. Xagga Giriigta marka laga eero eraygani wuxuu la xidhiidhaa qof addeeca waxyaabaha la xidhiidha ilaahnimada iyo bulshada. Laakiinse xagga Cibraaniga waxa had iyo jeer ay ka tarjumaysaa axdi. Ilaah waa cadaali, oo waxa uu rabaa in dadkiisu ay ka tarjumaan oo muujiyaan dabeecaddiisa. Haddaba, aadanahan denbiga la daahiriye ayaa waxa ay noqonayaan abuur cusub. Noloshan cusboonaanta ah waxa ka imanaya nolol wanaagsan oo ku dheehan cibaado (Roman Katoliguna waa waa sida ay xaqnimada u arkaan). Haddaba, maadaama oo Israa'iil iyagu gaar isu arkayeen may jirin siyaabo lagu kala saaro dadka caadiga iyo kuwo qudiisiinta ah isla markaasna ku socda doonista Ilaah. Eraygan lagu dhex adeegsaday Cibraaniyada iyo Giriiggaba waxa loo tarjumay luqada Ingiriisida "xaq" (iyadoo la xidhiidha bulshada) iyo "xaqnimo" (oo la xidhiidha diinta).

Injiilka amaba warka wanaagsan ee Ciise Masiix ayaa waxa uu yahay, in aadanahaas denbaabay dib loogu cafiyay si ay Ilaah ula yeeshaan xidhiidh. Arrintan waxa lagu fuliyay jacaylka Aabbaha, naxariista, nimcada; noloshu Wiilka, dhimashadiisa, iyo sara kicistiisa; iyo Ruuxa inoo muujinaya warka wanaagsan. Xaqnimadu waa hadiyad Ilaah bixiyo, laakiin waa inay ku dheehnaato cibaado (Augustine heerka uu ka taagnaa xaqnimadu wuxuu ahaa xoojinta xornimada injiilka, halka Rooman Katoligu ka xoojinayaan beddelitaanka noloshu ku dhisan jacaylka iyo rumaysadka). Marka aan eegno mad-habka Reform (Dib u hagaajin) 'xaqnimada Ilaah' waxa weeyi in denbiga aadanahu uu yahay mid Ilaah aqbali karo, laakiin Catholic amaba Kaatoliga, waxa weeyi in qofku uu quduus iska dhigo oo marwalba Ilaah oo kale isu ekaysiyya. Haddaba,

xaqiiqada marka la eego labadaba waa ay tahay!

Aniga fahankayga aan ka qabo Kitaabka Quduuska ah, laga bilaabo Bilowgii ilaa Muujintii waxa uu yahay dib usoo hagaajinta xidhiidhkii Ilaah ee beer Ceeden. Baybalku waxa uu ku bilaabmayaa xidhiidhkii ka dhexeeyay Ilaah iyo aadanaha markii dhulka la abuuray (Bilowgii 1-2) waxaanu ku dhammaanayaa aragtidaas mid lamida (Muujintii 21-22). Muuqaalka Ilaah iyo ujeedadiisuba waxa ay noqon doonaan kuwo dib loo hagaajiyo!

Aniga aragtidayda gebi ahaanba ku waajahan Baybalku marka laga bilaabo Bilowgii 4 ilaa Muujintii 20, waxa weeyi Ilaah oo dib u hagaajin ugu samaynaya xidhiidhkii Beer Ceeden. Baybalku wuxuu ku bilaabmayaa Ilaah iyo aadanaha oo xidhiidh wada lahaa (Bilowgii 1-2) waxaanu ku dhammaanayaa isla arrintaas (Muujintii 21-22). Ilaah ekaanshihiisa uu ka sameeyay aadanaha iyo ujeeddadiisuba waxay noqon doonaan kuwo dib loo hagaajiyo!

Si baadhitaan aad ugu samayso falaqayntan aan kor kusoo xusnay u firso aayadahan aan kasoo xulnay Axdiga Cusub:

1. Ilaah waa mid xaqnimo leh (waxa ay la xidhiidhaa Ilaah oo ah Xaakin)
 - a. Rooma 3:26
 - b. 2 Tesaloniika 1:5-6
 - c. 2 Timoteyos 4:8
 - d. Muujintii 16:5
2. Ciise wuxuu leeyahay xaqnimo
 - a. Falimaha Rasuullada 3:14; 7:52; 22:14
 - b. Matayos 27:19
 - c. 1 Yooxanaa 2:1,29; 3:7
3. Ilaah wuxuu abuuray xaqnimo ayuu la doonayaa
 - a. Laawiyyintii 19:2
 - b. Matayos 5:48 (Rooma 5:17-20)
4. Ilaah waxa uu rabaa inuu bixiyo oo dib usoo nooleeyo xaqnimada
 - a. Rooma 3:21-31
 - b. Rooma 4
 - c. Rooma 5:6-11
 - d. Galatiya 3:6-14
 - e. Waxa bixiya Ilaah
 - 1) Rooma 3:24; 6:23
 - 2) 1Korintos 1:30
 - 3) Efesos 2:8-9
 - f. Waxa lagu helaa rumaysad
 - 1) Rooma 1:17; 3:22.26; 4:3,5,13 9:30; 10:4,6,10
 - 2) 1 Korintos 5:21
 - g. Waxa lagu helayaa waxqabadkii Wiilka
 - 1) Rooma 5:21-31
 - 2) 2 Korintos 5:21
 - 3) Filiboy 2:6-11
5. Doonista Ilaah waa in kuwa isaga raaca ay xaqnimo lahaadaan
 - a. Matayos 5:3-48; 7:24-27
 - b. Rooma 2:13; 5:1-5; 6:1-23
 - c. 1 Timoteyos 6:11
 - d. 2 Timoteyos 2:22; 3:16
 - e. 1 Yooxanaa 3:7
 - f. 1 Butros 2:24
6. Ilaah dunida waxa uu ku kala xukumi doonaa xaqnimadooda
 - a. Faliimaha Rasuullada 17:31

b. 2 Timoteyos 4:8

Xaqnimada waa dabeecadda Ilaah, oo aadanaha denbaabayna waxa lagu siiyay Ciise Masiix aawadiis:

1. Waa xukunka Ilaah
2. Waa hadiyadda Ilaah
3. Waa shaqadii Masiixa
4. //////////////

Laakiin sidoo kale in xaqnimada la yeesho waxa loo mara jid, oo maalin maalmaha ka mida ayaa la dhammays tiri doonaa, waana marka labaad ee Masiixu soo laabto.

Kuwani waa waxyaalo lagasoo qaatay *Dictionary of Paul and His Letters* (Qaamuuska Bawlas iyo Waraaqihiisii)

“Calvin, wuxuu si ka badan Luther, u sheegayaa xidhiidhka saamaynta ah ee xaqnimada Ilaah. Luther aragtida uu ka qabo xaqnimada Ilaah ayaa waxa ay tahay dhinaca xorriyadda iyo xukun la’aanta. Calvin ayaa isna waxa uu sheegayaa dabeecadda cajiibka leh ee wada xidhiidhka ku dhisan xaqnimada Ilaah ina siiyay” (p. 834).

Aniga aragtidayda, xidhiidhka Ilaah la leeyahay Masiixiyiinta waxa uu taabanayaa saddex dhinac:

1. Injiilku waa shakhsi (Kaniisadda Bari iyo fahanka Calvin).
2. Injiilku waa runta (fahanka Augustine iyo Luther).
3. Injiilku waa bedelitaanka nolosha (fahanka Kaatoliga).

Dhammaantood waa run waxaana waajib ah in la isku qabto si loo helo Masiixiyad ku dhisan Kitaabka Quduuska ah.

Waa inaan soo dhowayno Ciise!

Waa inaan rumaysano injiilka!

Waa inaan ku dayano tusaalaha Masiixa!

▣ **“oo waxaad weydiisateen nin dhiig qaba”** waxa la yaab leh iyada oo Barnabas uu ahaa dembiile qabay denbigii Ciise lagu eedeeyay (cf. Luukos 23:18-19,23-25).

3:15 “oo waxaad disheen” waxa la yaab leh in qoraallo badan oo tilmaamaya dhimashada Ciise (cf. 2:23,36; 3:15; 4:10; 5:30; 7:52; 10:39; 13:28) oo ku sugan Falimaha Rasuullada dhexdoodu ay yihiin kuwo aad u yar oo lagasoo horumariyay laynka Bilowgii. 3:15 ama Ishacyaah 53.

Sidoo kale waxa jirta kala duwanaansho ku sugan sida loo sheegay dhimashadiisa.

1. lagu musbaaray iskutallaab – 2:23
2. iskutallaab lagu qodbay – 2:36; 4:10
3. la dilay – 3:15; 13:28
4. la dilay iyadoo iskutallaab lagu deldelay – 5:30; 10:39
5. la dilay – 7:52

Sarakicista iyana waa la sheegay laakiin lama sheegin beddelka denbiyada

▣

NASB, NKJV

“Amiirkii nolosha”

NRSV, NIV

“hoggaamiyaha nolosha”

TEV

“ka u hoggaamiya nolosha”

NJB

“amiirka nolosha”

Moffatt

“horumariyaha nolosha”

Magacani waxa uu ka tarjumayaa mid kamida saddex macne oo suurto gal ah oo uu leeyahay erayga *archeēgos*:

1. hoggaamiyaha ama asaleeyaha (cf. NRSV, Cibraaniyada. 2:10; 12:2)
2. adeegga abuurka (cf. Yooxanaa 1:3; I Korintos. 8:6; Kolosay. 1:16; Cibraaniyada. 1:2)
3. horgalaha, (cf. TEV, NEB, Fal. 5:31)

Eraygani haddaba waxa uu kasoo horjeedaa “dhiig qabe” (aayadda 14). Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUCA GAAR AH: HOGGAAMIYE (ARCHĒGOS)

Ereyga “hoggaamiye” waa erayga Giriigga ah ee *archēgos*. Waxa ay asal ahaan ka timid erayga Giriigga ah ee “bilow” (*archē*) iyo “socodsiin” ama “hoggaamin” (*agō*). Ereyadana lakabka isku ahna waxa loo adeegsaday hoggaamiye, amiir, ama xaakin (aadane ama malaa’ig). Eraygan haddaba saddex jeer oo kale ayaa lagu dhex adeegsaday Axdiga Cusub:

1. Amiirka ama hoggamayaha ku sugan Fal 3:15
2. amiir ama hoggaamiye (cf. Fal 5:21)
3. the hoggaamiyaha (ama horumariyaha) iyo buuxiyaha rumaysadka ee ku sugan Cibraaniyada. 12:2. Ciise waa bilaabaha, bixiyaha, iyo dhammaystiraha badbaadada.

▣ “Ilaah ka sare kiciyey kuwii dhintay” caadi ahaan Axdiga Cusub dhexdiisa Aabbaha ayaa ah ka Wiilka ka sarakiciyay dhimashada iyadoo taasi calaamad u ah ansixinta noloshu Ciise, waxbaristiisa iyo isagoo noqday beddelka dhimashada. Sidoo kale Axdiga Cusubi waxa sheegayaa in saddex shakhsi ee Saddexmidnimadu ay ka dhex shaqaynayeen sara kicistii Ciise:

1. Ruuxa (cf. Rooma. 8:11)
2. Wiilka (cf. Yooxanaa 2:19-22; 10:17-18)
3. Aabbaha (cf. Fal 2:24,32; 3:15,26; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30,33,34,37; 17:31; Rooma. 6:4,9)

Tanina waa fiqiga ugu muhiimsanaa ee *Kerygma* (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14). Haddii tani aanay run ahayn, wax run ahiba ma jiro (cf. I Korintos. 15:12-19).

▣ “annaguna markhaatiyaal baannu ka nahay” Tani waa mid ahaan

1. xoojinta ilaha uugu horreeya; dhegaystayaashani waxay ahaayeen markhaatiyaal (cf. 2:22)
2. inay marjic u tahay xertii ama Rasuulladii ku sugnaa Qolladdii Sare (cf. 1:22; 2:32) marka la eego macnahana midda labaad ayaa ugu habboona.

3:16 “rumaysadka uu magiciisa ku rumaystay aawadiis” ereyadan oo kale waxay kusoo aroorayaan Filiboy 3:9. Ereyga Giriigga ah “rumays” (*pistis*) tarjumaaddisu waa “rumays,” “talo saarasho,” ama “isku hallayn.” Aadanaha ayaa ay shardi ku tahay inay ka jawaab celiyaan nimcada Ilaah ee shuruud la’aanta ah (Efesos 2:8-9). Asal ahaan waa rumaystayaasha oo isku halleeya runsheegnimada Ilaah (dabeecaddiisa, ballanqaadkiisa, Masiixiisa) rumaysashada runsheegnimada Ilaah! Bogsiimaha ku sugan Injiillada iyo Falimaha Rasuullada waxa adag in la qoro dhinaca ruuxi ahaaneed ee dhacdana. Kuwaas la bogsiyay hadiyo goor maaha kuwo “badbaaday” (Yooxanaa 5). Eeg Mawduucan Gaarka ah ee hoos ku xusan

1. Meeleeyaha Giriigga ah ee lagu adeegsaday ereyadan, *eis* (Filiboy 3:9), waa dhif marka loo adeegsado qof rumaysadka uu ku haysto Masiixa (sidanoo kale waxay ku sugantahay Fal 2:38). Caadi ahaan mid ka mida meeleeyayaal dhowr ah ayaa la adeegsaday:
2. *dia* – Rooma. 3:22,25,30; Galatiya. 2:16; 3:14,26; Efesos. 2:8; 3:12,17; Kolosay. 2:12; II Timoteyos. 3:15; I Butros. 1:5
3. *ek* – Rooma. 9:30; 14:23; Galatiya. 3:8,9,22; 5:5; Yacquub 2:24
4. *en* – I Korintos. 16:13; II Korintos. 13:5; Galatiya. 2:20; I Timoteyos. 3:13 labaduba *eis* iyo *ek* waxa lagu adeegsaday Rooma. 1:17.

Tanina may ahayn ereyo heerkoodu yahay in lagu sheego “rumaysadka wax badbaadinaya.”

MAWDUUC GAAR AH: RUMAYS, AAMIN, AMA ISKU HALLAYN (*Pistis* [MAGAC], *Pisteuō*, [FAL], *Pistos* [SIFO])

- A. Ereyganoo kale waxa uu muhiim ka dhex yahay Kitaabka (Cibraaniyada 11:1,6). Waxa weeyi

mawduuca wacdintii Ciise ee ugu horreysay (Markos 1:15). Ugu yaraan waxa jirta labo waxyaalood oo axdiga cusubi rabo: towbad keen iyo rumaysad (cf. Markos 1:15; Fal 3:16,19; 20:21).

B. Asalkeeda

1. Erayga “rumays” Axdiga Hore dhexdiisa macnihiisu waa runsheegnimo, daacadnimo waxaana lagu tilmaamay dabeecadda Ilaah, ee maaha teenna.
2. Waxa ay ka timid eray Cibraani ah (*emun, emunah*, BDB 53), oo loogala jeedo “hubaal ama xasillooni.” Rumaysadka wax badbaadinayaa waa xaqiiqo iyo qaab nololeed, waxa ugu horreeyaana waa xidhiidh (soo dhawaynta shakhsi) iyo u hoggaansanaan (go’aan) ta qofkaas.

C. Adeegsigeeda Axdiga Hore

Waxa la sheegi karaa Ibraahim rumaysadkiisa oon ku dhisnayn Masiixa mustaqbalka, laakiin ku tiirsanaa ballan qaadka Ilaah iyo inuu heli doonay ilmo iyo farcan (cf. Bilowgii 12:2; 15:2-5; 17:4-8; 18:14). Ibraahim ballan qaadkan waxa uu kaga jawaab celiyay isku hallaynta Ilaah. Waxa uu xitaa shaki kaga jiray ballan qaadkan soddon sanadood in lagu oofiyo. Rumaysadkiisa aan dhammaynska tirnaynina, si kastaba ha ahaatee, waxa uu noqday miduu Ilaah aqballo, waayo Ilaah waxa uu rabaa inuu la shaqeeyo aadanaha ballan qaadyadiisa kaga jawaab celiya rumaysad, xitaa haddii uu yahay mid aad yar (Matayos 17:20).

D. Adeegsigeeda Axdiga Cusub

Erayga “aaminay” waxa laga soo qaatay erayga Giriigga ah ee (*pisteuō*), kaasi oo sidoo kale loo tarjumi karo “aaminis,” “rumays,” amaba “talo saarasho.” Tusaale ahaan, MAGACU kumuu soo dhex aroorin Injiilka uu qoray Yooxanaa, laakiinse FALKA in badan ayaa lagu dhex adeegsaday. Yooxanaa 2:23-25 lama hubo in dadka soo ururay ee diyaarka u ahaa raacitaanka Ciisihii reer Nasereet. Tusaalayaasha kale ee sida aadka ah loogu adeegsaday eraygan “rumaysi” ayaa waxa aan ka arki karnaa Yooxanaa 8:31-59 iyo Falimaha Rasuullada 8:13, 18:24. Haddaba, xaqiiqada rumaysadka ee kitaabiga ahi waxay ka badan tahay rumaysadka ugu horreeya oo keliya. Waxa la rabaa inay noqota wax sii socda oon kala go’aynin (Matayos 13:20-22, 31-32).

E. Adeegsigeeda marka ay la socdaan MEELEEYAYAASHU

1. *eis* oo macneheedu yahay “gudihiisa.” Qaab dhismeedkan gaarka ahi wuxuu xoojinayaa rumaystayaasha oo rumaysadkooda iyo isku hallayntooda dhex dhigay Ciise.
 - a. magaciisa (Yooxanaa 1:12; 2:23; 3:18; 1 Yooxanaa 5:13)
 - b. Isaga (Yooxanaa 2:11; 3:15,18; 4:39; 7:5,31,39,48; 8:30; 9:36; 10:42; 11:45, 48; 17:37,42; Matayos 18:6; Falimaha Rasuullada 10:43; Filiboy 1:29; 1 Butros 1:8)
 - c. Anigu (Yooxanaa 6:35; 7:38; 11:25,26; 12:44,46; 14:1,12; 16:9; 17:20)
 - d. Wiilka (Yooxanaa 3:36; 9:35; 1 Yooxanaa 5:10)
 - e. Ciise (Yooxanaa 12:11; Falimaha Rasuullada 19:4; Galatiya 2:16)
 - f. Iftiinka (Yooxanaa 12:36)
 - g. Ilaah (Yooxanaa 14:1)
2. *en* oo macneheedu yahay “gudaha” sida ku sugan Yooxanaa 3:15; Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 5:14
3. *epi* oo macneheedu yahay “gudaha” amaba “galis” sida aan ka arki karno Matayos 27:42; Falimaha Rasuullada 9:42; 11:17; 16:31; 22:19; Rooma 4:5, 24; 9:33; 10:11; 1 Timoteyos 1:16; 1 Butros 2:6.
4. XAALADDA KU TIRINTA iyadoo aanu la soconin MEELEEYE sida aan ka arki karno Galatiya 3:6; Falimaha Rasuullada 18:8; 27:25; 1 Yooxanaa 3:23; 5:10
5. *hoti* oo macneheedu yahay “rumaysanahay” oo tusinaysa waxa la rumaysanayaa wuxuu koobsanayo
 - a. Ciise waa Kan Quduuska ah ee Ilaah (Yooxanaa 6:69)
 - b. Ciise waa Isagii (Yooxanaa 8:24)
 - c. Ciise wuxuu ku dhex jiraa Aabbaha, oo Aabbuhuna isaguu ku dhex jiraa (Yooxanaa 10:38)
 - d. Ciise waa Masiixa (Yooxanaa 11:27; 20:31)
 - e. Ciise waa Wiilka Ilaah (Yooxanaa 11:27; 20:31)
 - f. Ciise waxa soo diray Aabbaha (Yooxanaa 11:42; 17: 8,21)
 - g. Ciise wuxuu la mid yahay Aabbaha (Yooxanaa 14:10-11)

- h. Ciise wuxuu ka yimid Aabbaha (Yooxanaa 16:27,30)
- i. Ciise wuxuu naftiisa ku magacaabay magacii axdiga ee Aabbaha, “Isaga”(Yooxanaa 8:24; 13:19)
- j. Waxaan la noolaan doonaa Isaga (Rooma 6:8)
- k. Ciise wuu dhintay waanu sarakacay (1 Tesaloniika 4:14)

▣ Qaybta labaad ee aayadda 16 waxa la sheegayay iyadoo is barbardhig samaynasa, sidaasi darteedna waxay la mid tahay qoraallada xikmadda ee Cibraaniga.

1. a. “magaca Ciise”
 - b. “ayaa xoogsiiyey kan”
 - c. “aad arkaysaan oo garanaysaan”
2. a. “rumaysadka uu magaciisa ku rumaystay aawadiis”
 - b. “ku siiyey caafimaadkan”
 - c. “hortiinna”

NASB (UPDATED) TEXT3:17-26

¹⁷Waxaan ogahay, walaalayaalow, inaad tan aqoonla'aan u samayseen, sidii madaxdiinnuba yeeshay oo kale. ¹⁸Laakiin Ilaah sidaasuu u dhammeeyey waxyaalihii uu hore uga sheegay afalkii nebiyada oo dhan oo ahaa in Masiixu silci doono. ¹⁹Haddaba toobad keena oo soo noqda. si dembiyadiinna loo tirtiro, si ay wakhtiyo qaboojis lihii uga yimaadaan Rabbiga hortiiisa, ²⁰oo uu soo diro Ciise Masiix, kii uu hore idiinku doortay, ²¹kan ay waajibka tahay inay samadu aqbasho tan iyo wakhtiyada la soo celinayo wax walba oo Ilaah kaga hadlay afkii nebiyadiisii qoduuska ahaa tan iyo bilowgii. ²²Muuse wuxuu yidhi, Rabbiga Ilaaha ahu wuxuu walaalihiinna dhexdooda idiinka kicin doonaa nebi anoo kale ah. Waa inaad isaga ka dhegaysataan wax kastuu idinku yidhaahdo. ²³Waxay noqon doontaa in naf kastoo aan nebigaas dhegaysan dadka laga dhex saari doono oo la baabi'in doono. ²⁴Nebiyadii oo dhan tan iyo Samuu'eel iyo kuwii ka dambeeyey, in alla intii hadashay, waxay wada sheegeen maalmahan. ²⁵Waxaad tihiin wiilashii nebiyada iyo wiilashii axdigii Ilaah la dhigtay awowayaashiin, markuu Ibraahim ku yidhi, Qabiilooyinka dunida oo dhammu farcankaagay ku barakoobi doonaan. ²⁶Ilaah markuu Midiidinkiisii kiciyey, idinkuu markii hore idiin soo diray inuu idin barakadeevo markuu midkiin kasta dembiyadiisa ka soo ieedivo.

3:17 “Waxaan ogahay, walaalayaalow, inaad tan aqoonla'aan u samayseen” middani waxay ka tarjumaysaa ereyadii Ciise markii uu saarnaa iskutallaabtaa (cf. Luukos 23:34). Si kastaba ha ahaatee, xitaa iyadoo aqoon la ‘aani jirto, dadku ruuxi ahaan waa masuul! Dhinac marka laga eego middani waxay ahayd si dadka looga caawin karo inay aqbalaan masuuliyaddooda (cf. 13:27; 17:30; 26:9; I Korintos. 2:8). Falaqayn fiican oo arrintan ku saabsan ka eeg Millard Erickson, *Christian Theology*, 2nd ed., pp. 583-585.

▣ **“sidii madaxdiinnuba yeeshay oo kale”** Luukos badanaa waxa uu kala saarayaa dadka iyo madaxdooda (cf. Luukos 7:29-30; 23:35; Fal 13:27; 14:5). Arrinta dhabta ah ee isku daygan ayaa noqon kartaa labada kooxdood miskasta masuuliyaddiisa. Waxa la sheegay in Ciise aanu Yuhuudda oo dhan xukumin, laakiin uu xukumay hoggaamiyayaashooda sharci laawayaasha ah (oon ahayn mid ka yimid Haaruun). Hubaashii waxa adag in la ogaado habaaritaanka geedka berdehe ah (cf. Markos 11:12-14,20-24) iyo masaalka ku saabsan beerta canabka ah (cf. Luukos 20:9-18) ay yihiin xukunkii Yuhuuddii qarnigii hore ama hoggaamiyayaashooda oo keliya. Luukosna wuxuu ku sheegayaa labadaba.

3:18 “hore uga sheegay” injiilku muu ahayn wax uu Ilaah dib uga fikiray, laakiinse wuxuu ahaa qorshe Ilaah dejiyay (cf. Bilowgii. 3:15; Markos 10:45; Luukos 22:22; Fal 2:23; 3:18; 4:28; Rooma. 1:2, eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8). Wacdimihii ugu horreeyay ee ku sugan Falimaha Rasuulladu (*kerygma* da, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14) waxa ay Ciise uga hadlayaan isagoo ah dhammaystirka ballan qaadyada Axdiga Hore.

Waxa jira dhinac dhowr ah oo ay lahayd *Kerygma* (i.e., muhiimadda fiqi ahaaneed ee wacdinaha ku sugan Falimaha Rasuullada) lagu sheegey aayadahan.

1. muhiimadda Ciise oo la rumaysto
2. shakhsiyadda Ciise iyo shaqadiisa waxa lagusii sheegay Axdiga Hore
3. Masiixu waa inuu silco
4. waa inay towbad keenaan
5. Ciise marlabaad ayuu soo laabanayaa.

▣ **“sidaasuu u dhammeeyey waxyaalihii uu hore uga sheegay afalkii nebiyada oo dhan”** Ciise waxa uu dhammeeyay waxyaalihii lagu sii sheegay Axdiga Hore (cf. v. 34, Matayos. 5:17-48). Waxa aan u malaynayaa Ciise laftiisa ayaa middan tusiyaa markii ay u socdeen Emmaus (cf. Luukos 24:13-35) in Axdiga Hore uu sii sheegay Silcitaankiisa, dhimashadiisa, iyo sarakicistiisa. Middan waxa ay la wadaageen Rasuullada, kuwaasoo ka dhigtay qayb ka mid ah wacdintooda (cf. Luukos 24:45).

▣ **“Masiixu”** tani waa tarjumaadda Giriigga ee erayga Cibraaniga ah ee “Messiah” (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:31), taasoo macneheedu yahay ka la subkay. Middani waxa ay tilmaamaysaa adeegaha gaarka ah ee Ilaah kaasi oo noloshiisa iyo dhimashadiisu ay keeni doonaan xaqnimada, iyo casriga cusub ee Ruuxa. Sheegitaanka in Ciise Masiix uu ballan qaaday YHWH ayaa waxa ay noqonaysaa ujeeddo ka muuqanaysa wacdinta Falimaha Rasuullada.

1. Butros – 2:31; 3:18; 5:42; 8:5
2. Bawlos– 9:22; 17:3; 18:5,28

▣ **“silci doono”** waxa middan si aan toos ahayn loogu sheegay meelo dhowra oo ka mida Axdiga Hore (cf. Bilowgii. 3:15; Sabuurka 22; Ishachaah 53; Sekeryaah. 12:10). Arrintan silcitaanka Masiixu waxa ay ahayd midda ka yaabisay Yuhuudda (cf. I Korintos. 1:23). Waxa ay filanayeen mid wax ka adkaada oo qabsada (cf. Muujintii. 20:11-16). Middanina waxa ay ahayd midda ay Rasuulladu kaga hadlayeen Falimaha Rasuullada

1. Bawlos (cf. Fal 17:3; 26:23)
2. Butros (cf. Fal 3:18; I Butros. 1:10-12; 2:21; 3:18)

3:19 “towbad keena oo soo noqda” ereyga Giriigga ah ee “towbadkeen” waxa loogala jeedaa xagga maanka. Waa falka amarka ah ee *metanoeo*. Erayga Cibraaniga ah ee towbad keenna waxa loogala jeedaa “bedelitaanka camalka” (“noqosho” [*emistrephō*] waxa laga yaabaa inay ka tarjumayso ereyga Cibraaniga ah ee “jeedsii” *shub*, cf. Tirintii. 30:36; Sharciga Kunoqoshadiisa. 30:2,10) ee Sabtuujantiga. Towbad keenku waa axdiga lagama maarmaan u ah badbaadada oo la socda rumaysadka (cf. Markos 1:15 iyo Fal 3:16,19; 20:21). Falimaha Rasuulladuna badanaa wuu sheegayaa (cf. Butros – 2:38; 3:19,26 iyo Bawlos– 14:15; 17:30; 20:21; 26:20). Towbad keenku waa muhiim (cf. Luukos 13:3 iyo II Butros3:9). Asal ahaanna waa doonitaanka inuu qofku is beddel la yimaaddo. Waxaanay isugu jirtaa doorashada aadanaha iyo hadiyadda Ilaah (cf. Fal 5:31; 11:18; II Timoteyos. 2:25). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:38.

▣ **“si dembiyadiinna loo tirtiro,”** waxa loogala jeedaa “masixitaan” ama “dhaafis” (cf. Kolosay. 2:14; Muujintii. 3:5; 7:17; 21:4). Waa ballan qaad la yaab leh! dunidii hore khadka waxa laga samayn jiray aysiidh sidaasi darteedna lama masixi karin. Haddaba tani waa mucjisada nimcada Ilaah (cf. Sabuurka. 51:1; 103:11-13; Ishacyaah. 1:18; 38:17; 43:25; 44:22; Yeremyaah. 31:34; Miikaah 7:19). Waana marka Ilaah uu dhaafdo denbiyada (tirtiro)!

▣ **“wakhtiyo qaboojis lihii”** ereyga Giriigga ah (*anapsuchō, anapsuxis*) asal ahaan macnihiisu waa “nefisaad” (Baker, Arndt, Gingrich, iyo Danker, *A Greek-English Lexicon*, p. 63), “howo cusboonaysiini,” ama “nabarkoo hawo lagu daweyo” (Kittle, *Theological Dictionary of the New Testament*, vol. 9, p. 663). Ujeedada laga leeyahay ee shabbaahaaduna waa qaboojiska jidh ahaan ama ruux ahaaneed.

Sebtuujantiga dhexdisaa waxa loogu adeegsaday dib u xoogaysiga dagaalka dabadiis (cf. Baxniintii. 23:12; Xaakinnadii. 15:19; II Samuu’eel. 16:14) ama dib u cosboonaanta caadifad ahaaneed sida ku sugan I Samuu’eel. 16:23.

Waxay u muuqataa Butros inuu middan uugu noqonayo ballan qaadyada Axdiga Hore, laakiinse ereyadan laguma dhex adeegsan Axdiga Hore. Dadka saxarahu waxay ku tilmaameen xorriyad iyo farxad, halka meelaha xidhani ay calaamad uuga ahaayeen dhibaataada iyo murugada. Ilaah waxa uu rabay inuu keeno wakhtiga ku cusboonaysiinta shaqada ruuxiga ah, iyadoo shaqada Maisixuna ku timid injiilka. “wakhtiyada cusboonaantu” waxay ku yimaaddeen Ciisihii reer Naasereet. Si kastaba ha ahaatee, aqbalitaanku waxa uu keenayaa casriga cusub ee Ruuxa. Haddaba macnaha halkan ka muuqda Butros waxa uu ku tilmaamayaa Imaatinka Labaad. Ereyadani waxay u muuqdaan kuwo la siman “wakhtiga dib usoo celinta” (aayadda 21). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14.

3:20 “oo uu soo diro Ciise Masiix” Waa fal shaqaynaha oo wax loo tiirinayo, kaasi oo tusinaya xaalad mustaqbal ah. falalka dhegeystayaashii Butros macnaha qaar waxay samaynasaa wakhtiga ruuxiga ah (cf. F. F. Bruce, *Answers to Questions*, halkaasoo uu kula xidhiidhinayo Fal 3:19-21 iyo Rooma. 11:25-27, p. 201). Isu dhowayna “Ciise” oo loo dhaweeyo “Masiixa” waxay u muuqataa iyadoo loogala jeedo Butros oo si gaar ah u tilmaamaya Ciisaha reer Naaserteet oo ah Masiixa. Mardanbena Axdiga Cusub waxa lagu tilmaamay “Rabbi,” “Ciise,” iyo “Masiix” oo badanaa kusoo arooraysa iyadoo lala xidhiidhinayo Ciise (Rabbi Ciise Masiix) oo kaddibna xoojinaysa magaca Masiix. Middana waxa aad looga adeegsaday kaniisadda kuwa aan Yuhuudda ahayn.

▣ **“Masiixa uu hore idiinku doortay”** falkani waa fal dhammaystiran. Waxa ay la mid tahay doorashada Ilaah ee ugu horraynba ahayd sida ku sutan 10:41; 22:14; 26:16; imaatinka iyo dhimashada Ciisena mar walba waxay ahaayeen qorshaha Ilaah ee ku waajahan cafiska (cf. 2:23; 3:18; 4:28; 13:29). Sebdujantiga dhexdiisa ereyadani waxay ka tarjumayaan doorasho, laakiinse lama socoto hore usii ogaansho (i.e., Luukos “hore” wuxuu ka wadaa ka hor, cf. Baxniintii. 4:13 iyo Yashuua. 3:12), kaasi oo ka muuqanaya adeegsiga aayaddan ee Falimaha Rasuullada. Waxa ay gudbinaysaa in Ciise soo diritaankiisu ahaa doorashada Ilaah ee barakada iyo dembidhaafka!

3:21

NASB, NKJV	“kan ay waajibka tahay inay samadu aqbasho”
NRSV	“kan ay waajibka tahay inuu samada sii joogo”
TEV, NIV	“waa inuu samada sii joogo”
NJB	“kaasoo ay waajib tahay inay samadu hayso”

Fal sameeyaha ereyadani waa “samada”; falku cidda uu ku dhacyaana waa “kan” (Ciise). Haddaba waxa jira labo fal ahaaneed oo ku sugan ereyadan. Midka hore waa *dei*, from *deō* oo macneheedu yahay “waa lagama maarmaan” ama “waxa habboona.” Eeg fiirada 1:16.

Midka labaadna waa Falka wakhtiga dhexe tegay ee *dechomai*. Harold K Moulton, *The Analytical Greek Lexicon Revised* ayaa odhanaya macnuhu waxa uu tusinayaa “aqbalitaan iyo hayn” (p. 88). Waxaanad arki kartaa sida tarjumaadaha Ingiriisidu ay u qaataan dhinaca macnaha tuducu toosinayo. Luukos haddaba ereyada waxa uu Axdiga Cusub ugu adeegsanayaa si ka badan qorayaasha kel (13 jeer Luukos dhexdiisa iyo 8 jeer oo ah Falimaha Rasuullada). Ereyada waa in lagu qeexo sida loogu adeegsaday macnaha ay ku bixinayaan tuduca mana aha in loo adeegsado ekaysiini. Qamuusyaduna waxa keliya oo ay tusinayaan adeegsiga, mana tusinayaan qeexitaanka macnaha!

▣	
NASB	“tan iyo”
NKJV, NRSV,	
TEV	“ilaa iyo”
NJB	“ilaa”

Ereygani waxa uu ku sugan yahay qoraalka Giriigga ee UBS⁴ ka. Garan maayo sababta NASB, 1995 uu ugu qorayo far jiiifta taasi oo tusinaysa in aanay ku jirin qoraalka Giriigga, laakiinse loogu daray akhristayaasha Ingiriisidu si ay u fahmaan.

Daabacaadda NASB ee 1970 shaqalka ayuu ku qorayaa far jiiifta taasina waa sax.

▣ **“wakhtiyada la soo celinayo wax walba”** middani waxa ay sheegaysaa dib u noolaynta (cf. Matayos. 17:11; iyo gaar ahaan Rooma. 8:13-23). Sharka aadanaha leexday ee ku sugan Bilowgii 3 ayaa laga takhalusay abuurkana dib ayaa loo soo celiyay, sidoo kalena wehesashadii Ilaah ayaa dib loo aasaasay. Ujeedda ugu horraysa ee abuurkana ugu dambayntii waa la dhammaystiray.

▣ **“oo Ilaah kaga hadlay afkii nebiyadiisii qoduuska ahaa tan iyo bilowgii”** injiilka Markos ayaa waxa uu ku bilaabmayaa xigashada Malaakii 3:1. Matayos 1:22-23 iyana waxay sheegasyaa waxsii sheegista Ishacyaah. 7:14. Luukosna ereyadan la midka ah ayuu ku dhex adeegsaday Luukos 1:70. Mid ka mida wacdintii kaniisaddii ugu horraysay (fahan fiqi ahaaneed oo ka muuqanaya wacdinaha ku sugan Falimaha Rasuullada, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14) ayaa ah in Ciise dhalashadiisa, noloshiisa, dhimashadiisa iyo sarakicintu inay tahay waxsii sheegyadii Axdiga Hore oo lasoo celiyay (cf. Matayos. 5:17-19). Adeeggii Ciise muu ahayn fikir danbe ama qorshaha labaad laakiinse waxa uu ahaa qorshaha Ilaah (cf. 2:23; 3:18; 4:28; 13:29, eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8). Waxkastaana waxa ay ku shaqaynayaan dhammaystirka dib usoo celinta buuxda ee ah doonista Ilaah ka leeyahay dunida.

3:22 “Muuse wuxuu yidhi” magaca ah “nebiga” waxa loo adeegsaday imaatinka Masiixa (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 18:14-22; gaar ahaan. 15,18; Yooxanaa 1:21,25). Waxyaalahan qoran ee ku saabsan Ciise isla markaasna ku sugan Sharciga Muuse (qaybta ugu muhiimsan ee Axdiga Hore, Sudduukiyaanta iyo Farrisiitna) waxa ay muhiim u ahayd dhegeystayaasha Yuhuudda. Ciise hadiyo goor waxa uu ahaa qorshaha Ilaah ee cafiska denbiyada (Bilowgii 3). Waxa uu u yimid inuu dhinto (cf. Markos 10:45; II Korintos. 5:21).

3:23 Waxa ay ahayd ereyo dhab ah oo digniin ah. Waxa ay si dahsoon ugu noqonaysaa Sharciga Kunoqoshadiisa 18:19. Diiditanka Ciise waxa uu ahaa oo ilaa hadda uu yahay arrin dhab ah oo jirta..

Hadalkan sida dadban ugu noqonaya Sharciga Kunoqoshadiisa 18:14-22 waxa uu sidoo kale yeeshay fahan fiqi ahaaneed oo muhiim ah.

1. Fiiro u yeelo iyadoo keli iyo iskaashiba ay tilmaamayso. Nafkasta waa inay si shakhsi ahaaneed ugu jawaab celiso Masiixa, mana aha mid wax taraysa in keli ahaan ama koox ahaan looga mid noqdo Israa’iil.
2. Ereyada “baabi’in doono” waxa ay si dadban u sheegeysaa “jihaad.” Ilaah waxa uu faraqyada ka jari doonaa geedkiisa canabka ah (Israa’iil cf. Yooxanaa 15; Rooma. 9-11). Kuwa diida “nebigu” waxa ay yihiin kuwo Ilaah diiday. Arrinta badbaadaduna waa qofka oo u jawaab celiya Masiixa Ilaah. Qoys, cirqi, qabiil, iyo waxa la midka ahina maaha waxa lagu heli karo badbaadada, laakiinse waxa lagu helayaa rumaysashada Masiixa (I Yooxanaa 5:12).

3:24 “Samuu’eel” qoraallada Yuhuudda (I Samuu’eel) waxa lagu tiriyay mid kamida “Nebiyadii Hore,” oo ka qayb ah qaybta labaad ee qoraallada Cibraaniga. Samuu’eel waxa loogu yeedhay nebi sida ku sugan I Samuu’eel. 3:20 sidoo kalena eeg (erey kale oo nebi loo adeegsaday) I Samuu’eel. 9:9; I Taariikhdi. 29:29.

▣ **“maalmahan.”** Wakhtiga dib u cosboonaantu (aayadda 20) iyo “wakhtiga dib usoo celinta waxkasta” (aayadda 21) waxa ay tilmaamaysaa dhaqan gelinta Boqortooyada Ilaah iyo soo laabashada Masiixa, laakiinse ereyadani waxay tilmaamayaan bilowga boqortooyada Masiixa, taasi oo ku timid markii Ciise uu Beytlaxam jidhka kusoo qaatay ama ugu yaraan gebi ahaanba maalmaha ugu danbeeya, taasi oo u dhaxaysa labada jeer ee Masiixu dhulka ka muuqanayo. Axdiga Hore markii hore waxa laga fahmay hal imaatin oo Masiixu imanayo. Imaatinkiisa hore isagoo ah “Midiidin Silcaya” (aayadda 18) waxa uu ahaa layaab; waxaana la filiyay soo laabashadiisa isagoo ah hoggaamiye milateri ah oo wax xukumaya.

3:25 Butros waxa uu la hadlayaan carruurta Ibraahim oo ah dadka axdiga. Si kastaba ha ahaatee, dadkan axdigu waa inay rumaysad iyo towbad keen ay ugu jawaabaan Ciise iyo injiilka ama waa la diidi doonaa (aayadda 23)! Axdiga Cusubi waxa uu diiradda saarayaa shakhsi, mana aha koox cirqiya. Yeedhitaankii ugu horreeyay ee Ibraahim waxa uu ahaa arrin caalami ah (Bilowgii 12:3). Waxa dunida loogu deeqay wuxuu ku yimid Masiixa cid kastana waa u diyaar (Luukos wuxuu wax u qorayay kuwa aan Yuhuudda ahayn. Injiilka iyo Falimaha Rasuulladuna arrintan si joogto ah ayay uga hadlayaan).

▣ **“axdigii”** Eeg Mawduuca Gaarka ah: Axdi 2:47.

▣ **“Qabiilooyinka dunida oo dhammu farcankaagay ku barakoobi doonaan”** middani waxay u noqonaysaa ballan qaadkii Ilaah uu ku siiyay Ibraahim Bilowgii. 12:1-3. Fiirro u yeelo arrinta caalamiga ah ee sidoo kale ku sugan Bilowgii 22:18. Ilaah Ibraahim ayuu doortay si uu dadka u doorto oo dunidana u doorto (cf. Baxniintii. 19:5-6; Efesos. 2:11-3:13). Eeg Mawduuca Gaark aah 1:8.

3:26 “idinkuu markii hore idiin” Yuhuuddu dhaxaltooyadooda axdiga daraaddiis, waxay haysteen jaaniska ugu horreeyay ee maqalka iyo fahanka farriinta injiilka (cf. Rooma. 1:16; 9:5). Si kastaba ha ahaatee, waa inay ka jawaabaan oo la yimaaddaan towabad keen, rumysad, baabtiis, addeecitaan iyo dadaal.

▣ **“Midiidinkiisii kiciyey oo idiin soo diray”** eeg fiirada 2:24 iyo 3:13.

▣ **“inuu idin barakadeeyo”** tani waa midda uu Ilaah la rabo aadanaha oo hnan (Bilowgii 12:3). Si kastaba ha ahaatee, idaha lumay ee guriga Israa’iil ayuu ugu horrayn usoo diray Ciise.

▣ **“markuu midkiin kasta dembiyadiisa ka soo jeediyo.”** Badbaadadu waxay koobsanaysaa beddelitaanka maanka ku saabsan denbiga taasi oo ay ka imanayso natiijo ka muuqanaysa bedelitaanka camalada iyo waxyaalaha muhiimaddu tahay. Isbeddelkani waxa uu caddayn u yahay rumaysaho dhab ah, nolosha daa’imiska ahina waxay leedahay dabeecad loo fiirsan karo!

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Waa maxay “joogtayntu”?
2. Maxay bogsiinta awood u lahayd?
3. Muxuu Masiixa silcayaa layaab uugu ahaa Yuhuudda?
4. Muxuu Luukos wax uuga soo xigtay Bilowgii 12:3?
5. Yuhuuddu masi dadka kale ka duwan ayay u badbaadeen?

FALIMAHA RASUULLADA 4

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Butros iyo Yooxanaa oo hor jooga guddida	Butros iyo Yooxanaa waa la xidhay	Xidhitaankii iyo sii dayntii Butros iyo Yooxanaa	Butros iyo Yooxanaa oo hor jooga guddida	Butros iyo Yooxanaa oo horjooga Senhadriinka
4:1-4	4:1-4 La hadlitaankii Senhadriinka	4:1-4	4:1-4	4:1-4
4:5-22	4:5-12 Magaca Ciise oo la mamnuucay	4:5-12	4:5-7 4:8-12	4:5-12
	4:13-22	4:13-22	4:13-17 4:18-22	4:13-17 4:18-22
Rumaystayaasha oo si kalsooni leh u tukaday	Tukasho kalsooni ku jirto		Rumaystayaasha oo kalsooni ku tukaday	Rasuullada oo tukaday iyadoo silcini jirto
4:23-31	4:23-31	4:23-31	4:23-30 4:31	4:23-26 4:27-31
Waxkastaa dhexbuu ahaa	Wadaagitaanka waxkasta	Wadaagitaanka manfacada	Rumaystayaasha oo wadaagay waxay haystaan	Bulshadii kaniisaddii ugu horraysay
4:32-37	4:32-37	4:32-5:11	4:32-35 4:36-37	4:32 4:33 4:34-35 Deeqsinimadii Barnabaas 4:36-37

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Waxa muuqata in qaybta cutubyadu aanay ku haboonayn Falimaha Rasuullada. Xasusnow, qaybtinta cutubyada, aayadaha, adeegsiga xarafyada waawayn, sadaraynta, iyo xarakadu dhammaantood lagama helayo qoraalka Giriigga ah ee asalka ah, sidaasi darteedna dhamaantood waa shaqada gudiyaada tarjumayaasha casriga ah.
- B. Aayadaha 1-31 waxa ay ka hadlayaan bogsiinta ninka curyaanka ah ee ku jira cutubka 3 iyo cidhibteeda.
- C. Aayadaha 32-37 waxay raacayaan cutubka 5:1-11.
- D. Dhibaatooyinkii kaniisaddii ugu horreysay way sii soconayaan oo laban laabmayaan, laakiin nimcada iyo awoodda Ruuxuna way sii kordhaysay.
- E. Marka laga hadlayo Luukos sida uu u adkaynayo jacaylka, dabecaddii waxbixinta ahayd ee kaniisaddii Yerusaaalem, fasiraadda casriga ahi waa inay iska ilaaliso arrin ku salaysan “hantiyeelasho.” Waxay u muuqataa Luukos inuu ka hadlayo waxyaalo mutadawcnimo ah. Falimaha Rasuulladu ma tegeerayo hanti wadaag ama raasamaal maxaa yeelay labadooda midna lama aqoonin wakhtigaas. Haddaba aayadaha waa in loo tarjumo si waafaqsan wakhtigaas iyo ujeeddada uu ka lahaa qoraagu iyo sidoo kale dhegeystayaasha caalamkoodii.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 4:1-4

¹Intay dadkii la hadlayeen ayaa wadaaddadii iyo sirkaalkii macbudka Sadukiintii u yimaadeen, ²iyagoo ka xumaaday, maxaa yeelay, waxay dadkii bareen oo Ciise ku ogeysiiyeen sarakicidda kuwii dhintay. ³Markaasay qabqabteen oo xabbiseen ilaa maalintii ku xigtay, maxaa yeelay, durba fiidkii bay ahayd. ⁴laakiin qaar badan oo hadalkii maqlay waa rumaysteen; oo tiradii nimanku waxay noqotay abbaaraha shan kun.

4:1 “wadaaddadii” ereyganii waa midka lagu adeegsaday qoraal gacmeedyadii hore ee Giriigga. Ⓝ, A, D, iyo E, laakiin MS C waxa uu dhigayaa “wadaaddadii sare” (*archiereis*). UBS⁴ waxa uu isna bixinayaa ereyga “wadaaddo” isagoo kusoo aroorinaya B (hubaal). Macnaha tuduca cutubka 4 waxa uu tusinayaa in is mucaaradnimadu aanay ka imanin Wadaaddada Sare (aayadda 6).

Axdiga Hore dhexdiisa qabiilka Laawiyiinta (Muuse iyo Haaruun qabiilkoodii) ayaa loo doortay inay u adeegaan YHWH iyagoo ah “curad” (Baxniintii 13). Qabiilkan dhexdiisa waxa jiray qoysas gaara oo u adeega sida

1. macallimiinta Sharciga

2. adeegayaasha macbadka
3. wadaadada loo gaar yeelay Macbadku, gaar ahaan waxa ay samayn jireen nidaamka qurbaan bixinta (Laawiyiintii 1-7).

Qoyska gaarka ah ee Wadaadka Sare uu ka iman jiray wuxuu ahaa qoyska Muuse iyo Haaruun. Qabiilkan oo dhamina may lahayn dhul sida qabiillada kale ee Israa'iil. Waxay lahayeen magaalooyin gaar ah oo la siiyay (48, magaalooyinka Laawiyiinta, Yashuuca 20). Qoysaskan Laawiyiintu waxa ay ku tiirsanaayeen qabiillada kale oo ku taageeri jiray macbadka waxa soo gala iyo sannadka saddexaad sadaqada la bixiyo.

Waxyaalahan oo dhammi waxay is beddeleen markii Rooma ay qabsatay Falastiin. Xafiiska Wadaadka Sarena waxa iibsatay Rooma. Waxa ay noqotay meel aan xafiis u noqonin waxyaalaha ruuxiga ah ee Axdiga Hore, laakiinse waxay noqotay meel ganacsi, iyo xafiis siyaasadeed. Wakhtiganna Wadaadka Sare waxa uu Keyfaas (cf. Matayos. 26:3; Luukos 3:2; Yooxanaa 18), laakiinse awoodda runta ah ee ka sarraysay xafiiskani waxa uu ahaa Wadaadkii Sare ee Annas (cf. Luukos 3:2; Yooxanaa 18:13,24; Fal 4:6). Qoyskanina waxa uu ahaa Suduukiyaata oo ah qayb ka mida Yuhuudda.

▣ **“sirkaalkii macbudka”** kani waxa uu ahaa xafiis u gaar ah Laawiyiinta kuwaasoo xagga awoodda ku xigay Wadaadka Sare (cf. Josephus, *Wars* 6.5.3). Waxa uu maamulayay ilaalada macbadka (cf. I Taariikhdi. 9:11; Nexemyaah. 11:11; Luukos 22:4,52; Fal 5:24,26). Xagga Cibraaniga waxa loogu yeedhi jiray “ninka buurta guriga.”

▣ **“Sadukiintii”** kuwani waxay ahaayeen hoggaamiyayaasha qaniga ah ee Sanhadriinka.

MAWDUUC GAAR AH: SADUKIIN

I. Asalka Kooxda

- A. Culimada badankoodu waxay rumaysanyihiin in magacani uu ka yimid Zadok, oo ahaa mid ka mida Daa'uud wadaaddadiisii sare (cf. II Samuu'eel. 8:17; 15:24). Wakhti danbe haddana Sulaymaan ayaa musaafuriyay Abiyatar waayo wuxuu taageeraya kacdoonkii Adoniyaaah (cf. I Boqorradii. 2:26-27) waxaanu Zadok u aqoonsaday Wadaadka Sare ee keliya (cf. I Boqorradii. 2:35). Kaddib musaafurintii Baabiloonka laynkan wadaadnimada dib ayaa loo aasaasay (Xaggay 1:1). Qoyskan Laawiyiinta ahna waxa loo doortay inay maamulaan macbadka. Kaddib kuwa dhaqan ahaanta u leh wadaadnimada iyo taageerayaahooda ayaa lagu magacaabay Sadukiin.
- A. Qarnigii sagaalaad C.D. dhaqanka rabbaaniga ahi (*Aboth* kii Rabbi Nathan) waxa uu sheegayaa in Zadok uu xer u ahaa Antigonus kii Sokho (qarnigii labaad C.H.). Zadok waxa uu si qaldan u fahmay odhaah caana “abaal marinta dhimashada dabadeed” waxaanu horu mariyay fiqi diidsan nolosha danbe isagoo sidoo kalena diiday sarakicinta jidhka.
- B. Intaas kaddib diinta Yuhuudda dhexdeeda Sadukiinta waxa lagu tiriyay Boethusiyaaniska. Boethus waxa uu sidoo kale ahaa xerta Antigonus kii Sokho, waxaanu jideeyay fiqi la mid ah ka Sadukiinta, isagoo sidoo kale diiddanaa nolosha danbe.
- C. Magaca Sadukiin muu soo if bixin lagasoo gaadho maalmihii John Hyrcanus (135-104 C.H.), waana sida uu sheegay Josephus (cf. *Antiquities* 13:10:5-6). Sida ku sugan *Antiquities* 13:5:9 Josephus waxa uu leeyahay waxa halkaas ka jiray “saddex dugsi oo fikirka ah,” Farrisiitna, Sadukiinta, iyo Essenes.
- D. Waxa jira aragtiyo tartamaya oo sheegaya inay ka yimaaddeen wakhtigii xaakinnadii Selusadka iyagoo isku dayayay inay wadaadnimada hoos geeyaan Antiochus IV Epiphanes (175-163 C.H.). Wakhtigii Makabiyaanka ayaa wadaadnimada cusubi ku bilaabantay Simon Maccabees (142-135 C.H.) iyo farcankiisii (cf. I Macc. 14:41). Wadaaddadan cusubi waxa suurto gala inay tahay bar bilowgii Sadukiinta. Farrisiintuna waxay soo baxeen isla wakhtigaas iyagoo ka yimid Hasidim (i.e., “kuwa kala baxay,” cf. I Macc. 2:42; 7:5-23).
- E. Waxa jirta iyana aragtida casriga ah (i.e., T. W. Manson), oo odhanaysa in Sadukiintu ay tahay iyadoo la higaadiyay ereyga Giriigga ah ee *sundikoi*. Ereyganina waxa uu tilmaamayaa hoggaamiyaasha hoose ee la xaajoon jiray xukuumadda Roomaanka. Waxa laga yaabaa tani inay sharraxayso sababta kuwo ka mida Sadukiintu aanay u ahayn wadaaddo, laakiinse ay xubin ka ahaayeen Sanhadriinka.

II. Waxyaalo la aaminsanyahay oo kala duwan

- A. Waxay ahaayeen wadaaddo Yuhuuda oo xagjira wakhtiyadii Hasmoneanka iyo Roomaanka.
- B. Waxa ay si gaara u danayn jireen nidaamka iyo maamulka macbadka.
- C. Waxa ay ansixiyeen Tawreed qoran (Bilowgii – Sharciga Kunoqshadiisa) oo ah midda awoodda leh, laakiise waxay diideen Dhaqamada caadiga ah (Talmuudka).
- D. Waxay haddaba diidanaayeen waxyaalo badan oo ka mida caqiidooyinka Farrisiinta.
 1. sarakicidda jidhka (cf. Matayos. 22:23; Markos. 12:18; Luukos 20:27; Fal 4:1-2; 23:8)
 2. fusuqa ama macsiyada nafta (cf. *Antiquities* 18.1.3-4; *Wars* 2.8.14)
 3. jiritaanka malaa'igaha (cf. Fal 23:8)
 4. waxay qaateen “isha il ha loo rido” (i.e., *lex talionis*) waxaanay taageereen ciqaabka iyo dhimashada jidh ahaaneed (halkii lacag lagu furan lahaa).
- E. Dhinac kale oo fiqi ahaaneedna waxa uu ahaa qadarka oo ay kasoo horjeedo doonista xorta ahi. Saddexda kooxoodba waxa sheegay Josephus
 1. Esseniyiintu waxay sheegeen nooc kala soocid ah
 2. Sadukiintu waxay adkeeyeen doonista xorta ah ee aadanaha (cf. *Antiquities* 13.5.9; *Wars* 2.8.14)
 3. Farrisiintuna waxay istaageen meel isu miisaamaysa labada kale.
- F. Dhinac marka laga eego khilaafka ka dhexeeyay labada kooxood (Sudukiinta - Farrisiinta) waxa uu u noqonayaa dareenka u dhexeeyay wadaaddada iyo nebiyada Axdiga Hore dhexdiisa.

Dareenkalena waxa uu ka kacayaa xaqiiqada Sidukiinta oo metalayay mujtamaha iyo dhulka. Waxay ahaayeen dabaqadda sare (cf. Josephus' *Antiquities* 13.10.6; 18.1.4-5; 20.9.1), halka Farrisiinta iyo culimmadu ka ahaayeen kuwo ka mid ah bulshada dadka. Dareenkani waxa uu caan ku ahaa macbadka oo ku yaallay Yerusaaalem iyadoo sinagoogyaduna ku yaalleen dhulka oo dhan.

Dareenkalena waxa laga yaabaa inuu soo jeediyay diidmada Sidukiinta oo diidanaa saamaynta Zoroastranism ka fiqiga Farrisiinta. Tusaale ahaan isu ekaysiinta aadka u sarraysa, lamaanaynta u dhexaysa YHWH iyo Shaydaan iyo nolosha danbe oo lagu saleeyo aragtida waxyaalaha jidhka ah ee la taaban karo. Waxyaalahan ka imanaya Esseniyiinta iyo Farrisiintu waxay Sidukiinta ku sababeen inay ka ficil celiyaan, waxaanay u noqdeen garabka xag jirka ah ee ah fiqiga Muuse oo keliya iyagoo isku dayaya inay qanciyaan kooxaha kale ee Yuhuudda ah.

III. Sources of Information

- A. Josephus ayaa haya ilaha ugu sarreeya ee warbixinta ku saabsan Sidukiinta. Waxa uu labadaba ku saleeyay isaga oo u daacad ah Farrisiinta iyo isagoo xiisanaya inuu sawir wanaagsan oo ku saabsan nolosha Yuhuudda siiyo Roomaanka.
- B. Ilaha kale ee warbixinta laga heli karaana waa qoraallada rabbaaniyiinta. Si kastaba ha ahaatee, halkan waxa sidoo kale ah caddayn. Sidukiintu waxa ay diideen awood dhaqameedka duqaytida (Talmuudka). Qoraalladan Farrisiyiintuna waxay si cad uga soo horjeedaan arrintan, waxaana suuro inay buunbuunin ku sameeyeen.
- C. Ma jiraan qoraallo la garanayo oo ay leeyihiin Sidukiinta laftoodu oo badbaaday. Burburintii Yerusaaalem iyo Macbadka 70 C.D. ayaa lagu baabiiyay dhammaanba wixii qoraal ahaa ee jiray. Waxa ay markaas damceen inay helaan nabad geyiga ka aloosantay sida keliya ee ay ku heli kareen qarnigii koobaadna waxa ay ahayd inay iskaashi la sameeyaan Roomaanka (cf. Yooxanaa 11:48-50).

4:2

NASB, NKJV

NRSV

TEV

“iyagoo ka xumaaday”

“aad uga cadhooday”

“ka cadhaysnaayeen”

NJB

“si aada uuga xumaadeen”

Waa erey Giriiga oo dhif ah (halkana waa fal wakhti xaadirkaas jooga) macnihiisuna yahay “aad oo waxloo qabto.” Waxa laga heli karaa oo keliya Falimaha Rasuullada (16:18). Lagama helayo Sebtuujantiga amaba luqada Koinig qadiimiga ah ee Masar.

Hoggaankii Sidukiyiintu waa uu cadhooday maxaa yeelay hoggaamiyayaasha Masiixiyiinta ayaa Macbadka dhexdiisa ku samaynayay waxbaris iyadoo sheeganaya Ciise sarakicistiisa (taasoo ay diiddanaayeen Sidukiyiintu, iyo sidoo kale fahanka guud ahaan la xidhiidha sarakicista). Sidoo kale ereyeyna aayadda 2 waxa suurto gal ka ah, in Rasuulladu aanay ka hadlayn oo keliya sarakicista Ciise, balse ay ka hadlayeen sarakicista dhammaanba rumaystayaasha (1 Korintos 15).

4:3 “iyagu” aayadda labaad magac uyaalka ku sugan wuxuu tilmaamayaa Butros, Yooxanaa iyo laga yaabaa ninkii curyaanka ahaa ee la bogsiiyay. Aayadda 3 magac uyaalka ku jiraana waxa uu sheegayaa wadaadada iyo ilaalada macbadka.

▣ **“Markaasay qabqabteen”** falkan Giriigga ahi waxa adeegsi ballaadhan ku leeyahay semitaga, laakiin Luukos badanaa wuxuu u adeegsanayaa macnaha xidhitaanka (cf. Luukos 20:19; 21:12; Acts 5:18; 12:1; 21:27).

▣ **“ilaa maalintii ku xigtay”** Sharciga Yuhuuddu waxa uu mamnuucay maxkamadaynta iftiinka dabadiis. Hoggaamiyayaashanina waxay rabeen in waxbaristan si dhakhso ah loo joojiyo, sidaasi darteedna waxay iyaga ku xidheen meel ka mida Macbadka oon la mid ahayn jeelka guud (5:18).

4:4 “qaar badan oo hadalkii maqlay waa rumaysteen” labadan falba waa fal wakhti tegay ah. rumaysadku wuxuu ku bilaabmaa maqlitaan (cf. Rooma. 10:17). Maqlitaanka injiilkana waxa ka dhalanaysa (iyadoo uu la socdo adeegga Ruuxu, cf. Yooxanaa 6:44,65; 16:8-11) rumaysashada injiilka. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:40.

▣ **“oo tiradii nimanku waxay noqotay abbaaraha shan kun”** Fiiro u yeelo iyadoo tiradan aanay ku jirin haweenka iyo carruurta. Badanaa Axdiga Cusub waxa ka muuqanaysaa iyadoo qoyska uu aabbuhu ku koobsanayo qoyska oo dhan (cf 11:14; 16:15,31,33). Tiradii dadkii ku jiray qolladda sare waxa lagu qiyaasay 120 qor. Maalintii Bentekoskana waxa kusoo biiray 3,000 (2:41); haddana tirada rumaystayaashu waxay ka badantahay 5,000! Tirada kaniisadda Yerusaaalemna si laxaad leh ayay u koraysay!

NASB (UPDATED) TEXT: 4:5-12

⁵Markaasaa waxaa dhacday in maalintii dambe taliyayaashoodii iyo waayeelladoodii iyo culimadoodii ay Yerusaaalem isugu soo wada urureen; ⁶waxaana joogay Annas oo ahaa wadaadkii sare, iyo Kayafas, iyo Yooxanaa, iyo Aleksanderos, iyo in alla intii wadaadka sare xigaalo la ahayd. ⁷Oo intay dhexda soo taageen bay weydiiyeen oo ku yidhaahdeen, Xooggee ama magacee baad waxan ku samayseen? ⁸Markaasaa Butros oo Ruuxa Qoduska ahi ka buuxo wuxuu iyaga ku yidhi, Kuwiinnan dadka u taliya iyo waayeelladow, ⁹haddii maanta naloo imtixaamayo falimihii wanaagsanaa oo loo sameeyey nin xoog daran iyo sidii ninkan loo bogsiiyey. ¹⁰dhammaantiin ogaada, idinka iyo dadka reer bini Israa’iil oo dhammu. in magaca Ciise Masiix. kii reer Naasaret, oo aad iskutallaabta ku qodobteen. oo Ilaah ka sara kiciyey kuwii dhintay. daraaddiis ninkanu isagoo bogsaday halkan hortiiinna ah ku taagan yahay. ¹¹Isagu waa dhagixii idinkoo wax dhisa aad diiddeen. oo noqday madaxa rukunka. ¹²Mid kale badbaadada lagama helo, maxaa yeelay. ma jiro magac kale samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyey oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno.

4:5 “taliyayaashoodii iyo waayeelladoodii iyo culimadoodii” Gudiga Sanhadriinku (i.e., Guddiga , 5:21, agagaarka Yerusaaalem; guddiga duqaytida, 22:5) waxa uu ka koobnaa toddobaatan hoggaamiye oo Yuhuud ah. Waxa uu ahaa ururka siyaasadeed ee ugu sarreeya (Roomaankuna ogolaa) ee Yuhuudda maalmihii Ciise. Fikirkanii waxa uu la bilaabmay Cesraa iyo “ragga Sinagooga Wayn.” Waxaana badanaa Axdiga Cusub dhexdiisa lagu magacaabay “culimmo, odayaal iyo wadaaddo sare” (cf. Luukos 23:13; Fal 3:17; 4:5,8; 13:27). Eeg Mawduucan Gaarka ah ee soo socda.

MAWDUUC GAAR AH: SANHEDRIINKA

I. Ilaha warbixinta

- A. Axdiga Cusub laftiisa
- B. Falavius Josephus kitaabkiisa *Antiquities of the Jews*
- C. Qaybta Mishnah ee Talmuudka (Tractate “Sanhedrin”)

Nasiib darro Axdiga Cusub iyo Josephus ma waafaqsana qoraallada rabaaniyiinta, taasina waxay u muuqataa inay Yerusaaalem ka jireen labo Sanhedrin, mid waxa xukumi jiray wadaaddada sarsare oo wuxuu la tacaali jiray caddaaladda iyo waxyaalaha khuseeya, ka labaadna waxa maamuli jiray Farrisiinta iyo culimada kale, waxaanu la xidhiidhayay diinta iyo arrimaha dhaqanka. Si kastaba ha ahaatee, qoraallada rabaaniga ee taariikhdoodu u noqonayso 200 C.D. waxa ay tusinayaan xaalad dhaqameed oo jirtay markii Yerusaaalem ay ku dhacday gacantii taliyihii Roomaanka ee Tiitos, taariikhdu markay ahayd 70 C.D. Yuhuuddu waxa ay noloshoodii diin ahaaneed dib ugu aasaaseen magaalo la odhan jiray Jamniya (118 C.D.) kaddibna waxay u guureen Galiili.

II. Eraybixinta

Dhibaataada ka taagan magacaabitaanka qaab xukumeedkan ayaa waxa ay ahayd iyadoo lagu tilmaami jiray magacyo kala duwan. Waxa jiray magacyo kala duwan oo qaab xukumeedka Yuhuudda ay bulshadu ku kala magacaabi jireen.

- A. *Gerousia* – “gudi.” Wuxuu ahaa eraygii ugu da’da waynaa ee la adeegsaday dhammaadkii wakhtigii Aasiyaanka (Josephus kitaabkiisa *Antiquities* 12:3.3 iyo *II Maccabees* 11:27). Luukos ayaa ku adeegsaday Falimaha Rasuullada 5:21 “Sanhedrin.” Waxa haddaba laga yaabaa inay ahayd qaab loogu sharaxayay dadkii Giriigga ku hadlayay (*I Macc.* 12:35).
- B. *Synedrion* – “Sanhedrin.” Waxay ka koobantahay labo eray oo kala ah *syn*(wada) iyo *hedra*(fadhiisi). Waxa la yaableh eraygan oo Aramaatiga lagu dhex adeegsaday, laakiinse ka tarjumaya eray Giriig ah. Dhammaadii wakhtigii Makaabiyanka ayaa eraygan waxa loo oggolaaday in lagu dhex adeegsado gudigii Yuhuudda ee Yerusaleem (Matayos 26:59; Markos 15:1; Luukos 22:66; Yooxanaa 11:47; Falimaha Rasuullada 5:27). Dhibku haddaba wuxuu imanayaa marka ereybixin tan lamida loo adeegsado meel ka baxsan Yerusaaalem (Matayos 5:22; 10:17).
- C. *Presbyterion* – “gudida odayaasha” (Luukos 22:66). Waxay ahayd qaab Axdiga Hore dhexdiisa loogu adeegsan jiray odayaasha qabiillada. Si kastabana ha ahaatee, waxa loo adeegsan jiray maxkamaddii sare ee Yerusaaalem (Falimaha Rasuullada 22:5).
- D. *Boule* – eraygan “gudi” waxa adeegsaday Josephus (*Wars* 2. 16.2; 5.4.2, laakiin maaha Axdiga Cusub) si uu u qeexo dhowr gudi xukun oo kala duwan: (1) golihii duqaytida ee Rooma; (2) maxkamadihii hoose ee Roomaanka; (3) maxkamaddii Yuhuudda ugu sarraysay ee Yerusaaalem; iyo (4) maxkamadihii hoose ee Yuhuudda. Yuusufkii reer Aramatiya haddaba waxa lagu sheegay inuu ahaa xubin ka mida qaabka eraygan (*bouleutes* oo macnihiisu yahay “gudoomiye” Markos 15:43; Luukos 23:50).

III. Horumarka Taariikh ahaaneed

Asal ahaan Cesraa ayaa loo sheegay inay hagaajiso Sangooga Wayn (Targum on Song of Songs 6:1) kaasi oo u muuqday wakhtigii Ciise inuu noqday Sanhedriinka.

- A. Mishnaha (Talmuud) ayaa sheegaya inay Yerusaaalem ka jireen labo maxkamadood (Sanh 7:1).
 - 1. Mid ka kooban 70 (ama 71) xubnood (*Sand* 1:6 xitaa waxay sheegaysaa in Muuse Sanhedrinkii u horreeyay ku sameeyay Tirintii 11, cf. Tirintii 11:16-25).
 - 2. Mid ka koobnaa 23 xubnood (laakiin waxa laga yaabaa inuu ahaa sanagoog hoose)
 - 3. Kuwo kamida culimada Yuhuudda ayaa rumaysan inay jireen 23 xubno Sanhadriin oo ka jiray Yerusaaalem. Marka saddexdu wada kulmaana waxa la odhan jiray “Sanhadriinka Wayn” ee 71 ka xubnood (*Nasi* iyo *Av Bet Din*).
 - a. Hal wadaad (Sidduukiyiinta)
 - b. Hal sharci (Farrisiinta)
 - c. Hal laandheere (odayaasha)
- B. Wakhtigii musaafuriska, faracii Daa’uud ee soo laabanayay wuxuu ahaa Zerubbabel sidoo kalena

faracii Haaruun ee soo noqonayay wuxuu ahaa Yashuuca. Markii Zerubbabel geeriyoodayna muujirin farac Daa'uud oo sii socon doonay, sidaasi darteedna xukunkii waxa loo dhaafay wadaaddada (I Macc 12:6) iyo odayaashii gudaha (Nexemyaah 2:16; 5:7).

- C. Doorkan wadaadadu ka qaadanayaan waxa wax ka qoray Diodorus 40:3:4-5 wakhtigii Hellenistic ga.
- D. Doorkan wadaadadu xukunka gacanta ku hayeeni wuxuu soconayay ilaa wakhtigii Selusiidh. Josephus ayaa wuxuu kagagasoo xiganayaa Aniochus III (223-187 C.H.) *Antiquities* 12. 138-142.
- E. Si Josephus sheegayo xukunkan wadaadadu wuxuu soconayay ilaa wakhtigii Makabiyaanka *Antiquities* 13.10.5-6; 13.15.5.
- F. Wakhtigii Roomanka xaakinkii Siiriya (Gabinius laga bilaabo 57-55 C.H.) ayaa aasaasay shan gobol "Senhadrin" (Josephus kitaabkiisa *Antiquities* 14.5.4; iyo *Wars* 1.8.5), laakiinse markii danbe Rooma ayaa baabtiisay (47 C.H.).
- G. Senhadrinku wuxuu muran siyaasadeed kula jiray Herodos (*Antiquities* 14.9.3-4) kaasi oo markii danbe ka takhalusay oo dilay badanaa intii maxkamadda ugu sarraysay (Josephus kitaabkiisa *Antiquities* 14.9.4; 15.1.2).
- H. Maamulkii Roomaanka (6-66 C.D.) Josephus wuxuu inoo sheegayaa (*Antiquities* 20.200,251) in markale Senhadriinku ay heleen awood tixgelin ah iyo saamayn (Markos 14:55). Waxa jiray saddex maxkamadood oo Axdiga Cusub lagu diiwaan geliyay halkasoo Senhadriinku uu hoos joogay maamulka wadaadka sare.
 - 1. Maxkamadayntii Ciise (Markos 14:53-15:1; Yooxanaa 18:12-23,28-32)
 - 2. Butros iyo Yooxanaa (Falimaha Rasuullada 4:3-6)
 - 3. Bawlos (Falimaha Rasuullada 22:25-30)
- I. Markii Yuhuudda la argigixiyay sanadkii 66 C.D. Roomaanku waxay baabiiyeen dadkii Yuhuudda ahaa iyo Yerusaaalem sanadkii 70 C.D. Senhadriinkana si ku meel gaadha ayaa loo xidhay, inkastoo Farrisiintii Jamniya ay isku dayeen inay keenaan shacrci cadaaladeed (*Beth Din*) oo ku salaysan diin nololeedka Yuhuudda (laakiin aan ahayn madani ama siyaasad).

IV. Xubinimada

- A. Meesha ugu horraysa ee kitaabku ku sheegayo maxkamaddii ugu sarraysay ee Yerusaaalem waxa ay tahay 2 Korintos 19:8-11. Wuxuu ka koobnaa (1) Laawiyiinta; (2) wadaadada; iyo (3) madaxda qoysaska (odayaasha, I Macc. 14:20; II Macc 4:44).
- B. Wakhtigii Makaabiyaanka waxa maamulayay (1) wadaadadii Siduukiyiinta iyo (2) xeer beegtidii hoose (I Macc 7:33; 11:23; 14:28). Goor danbe oo wakhtigan ah "culimada" (Sharci yaqaanada, badanaa Farrisiinta) waxa kusoo daray Aleksandar Jannayaas xaaskiisii Salome (76-67 C.H). Waxa xitaa laga sheegay inay Farrisiinta ka dhigtay kooxda ugu muhiimsan (Josephus kitaabkiisa *Wars of the Jews* 1.5.2).
- C. Wakhtigii Ciise maxkamaddu waxay ka koobnayd
 - 1. Qoyska Wadaadada Sare
 - 2. Dadka shacabka ah ee hodanka ah qoyskooda
 - 3. Culimada (11:27; Luukos 19:47)

V. Maraajicda

- A. *Dictionary of Jesus and the Gospels*, IVP, pp. 728-732
- B. *The Zondervan Pictorial Encyclopedia of the Bible*, vol. 5, pp. 268-273
- C. *The New Schaff-Herzog Encyclopedia of Religious Knowledge*, vol. 10, pp. 203-204
- D. *The Interpreter's Dictionary of the Bible*, vol. 4, pp. 214-218
- E. *Encyclopedia Judaica*, vol. 14, pp 836-839

4:6 "Annas" magaciisu Giriig waxa uu ku yahay Hanns; Josephus na waxa uu ku magacaabayaa Hannanos (Jonathan). Waxay u muuqataa magacani inuu ka yimid Cibraani "naxariisleh" (*hanan*, BDB 336).

Axdiga Hore dhexdiisa waxa ay ahayd mid ku sugan laynka Haaruun. Si kastaba ha ahaatee, Roomaanku waxay xafiiskan u rogeen goob siyaasadeed oo laga iibsaday qoyska Laawiya. Wadaadka sare waxa uu wax ku maamulayay Maxkamadda Dumarka. Ciise waxa uu nadiifiyay Macbadka isaga oo ka cadhooday qoyskan.

Sida uu sheegayo Flavius Josephus, Annas waxa uu wadaadka sare ahaa 6-14 C.D. Waxaana isaga magacaabay Quirinius, oo ahaa badhasaabkii Siiriyaa waxaana xilka ka qaaday Valerius Gratus. Qoyskiisa (5 wiil iyo wiil uu awow u yahay) ayaana ka daba yimid. Caiphas (C.D. 18-36), wiilkii uu soddoga u ahaa (Yooxanaa 18:13), ayaa ahaa la taliyihii. Annas waxa uu ahaa awoodda runta ah ee xafiiskan ka talisa. Sida Yooxanaa tilmaamayana waxa uu ahaa qofkii ugu horreeyay ee loo geeyo Ciise (cf. 18:13,19-22).

▣ **“Kayafas”** Waxa wadaadka sare u magacaabay Valerius Gratus kii Yahuudiya (cf. MS D, *Iōnathas*, cf. NEB, NJB) ilaa A.D. 18-36.

▣ **“Yooxanaa”** waxa laga yaabaa inay sheegayso “Yonataan,” ka uu Josephus inoogu sheegayo inuu ahaa mid ka mida Annas wiilashii kaasoo noqday Wadaadka Sare C.D. 36 Kayafas dabadiis. Si kastaba ha ahaatee, UBS⁴ ku wuxuu dhigayaa *Iōannēs* (Yooxanaa) isagoo ku tiranaya (hubaal); xitaa REB kuna wuxuu u laabanayaa “Yooxanaa.”

▣ **“Aleksanderos,”** waxba laga garan maayo ninkan, laakiin sida Yooxanaa oo kale, waxa uu xubin ka ahaa qoyska Annas ama waxa uu xubin hoggaamiye ah ka ahaa xisbiga Sanhadriinka.

4:7 “Oo intay dhexda soo taageen” xubnaha Sanhadriinku waxa ay ku fadhiisan jireen gogol fidsan iyagoo goobaabin samayn jiray.

▣ **“bay weydiyeen oo ku yidhaahdeen,”** kani waa fal aan dhammays tirnayn, oo loogala jeedi karo mid ahaan (1) fal wakhti tegey ah oo soconaya ama (2) bilaabitaanka fal.

▣ **“Xoogee ama magacee”** waxa ay u malaynayeen in bogsiiinta ay ku timid awood sixir ah (19:13). Waxa sidan oo kale ay ku dayeen Ciise (cf. Luukos 11:14-26; Markos 3:20-30). Ma diidi karaan mucjisooyinka sidaasi darteedna waxay isku dayeen inay ogaadaan meesha awooddu ka timid.

4:8 “Markaasaa Butros oo Ruuxa Qoduuska ahi ka buuxo” Ruuxu waxa uu ahaa isha xikmadda iyo kalsoonida ee Rasuullada (cf. Luukos 12:11-12; 21:12-15). Xasuuusnow ninkani wuxuu ahaa ninkii maalmo ka hor diiday Rabbiga cabsi daraaddeed (4:13). Fiiri u yeelo Butros oo uu ka “buxo” (cf. 2:4; 4:8,31). Waxa ay tusinaysaa inay tahay khibrad soo noqnoqonaysa (cf. Efesos. 5:18). Eeg fiirada 5:17.

4:9 “haddii” waa weedh shuruudeed heerka koobad ah oo xagga qoraaga ujeeddadiisana run uuga muuqata.

▣ **“haddii maanta naloo imtixaamayo”** ereygan Giriiggiisu macno ahaan waa “imtixaanka maxkamadeed” (cf. 12:19; 24:8; 28:18; Luukos 23:14). Waxa loo adeegsaday Yuhuuddii Khubarada ahaa si ay u eegaan Qorniinka iyagoo eegaya in Bawlos uu si saxa ugu fasirayo iyaga (17:11).

▣ **“falimihii wanaagsanaa oo loo sameeyey nin xoog daran”** Butros waxa uu sheegayaa maxkamadaynta gaarka ah oon ku habboonayn mucjiso layaab leh oo ah bogsiiin iyo naxariis. Waxa ay ahayd inta ay sidan yeelayaan in ay Ilaah ku ammaanaan arrintan!

▣ **“iyo sidii ninkan loo bogsiiyey.”** Waa fal dhammays tiran oo wax tusmaynaya, loogalana jeedo caafid helitaanka iyo bogsashada lugihisa.

4:10 “dhammaantiin ogaada, idinka iyo dadka reer bini Israa'iil oo dhammu” waa fal dhammays tiran oo amar ah. Ruuxu waxa uu dhiirrigelin siiyay Butros. Isagu kama warwarsana xukunka lagu qaadi doono. hoggaamiyayaashanina maaha kuwo awoodday inay Ciise xabaasha kusii hayaan sidoo kalena ma diidi karaan ninkan la bogsiiyay ee hortooda taagan!

▣ **“magaca Ciise Masiix. kii reer Naasaret, daraaddiis”** Butros waxa uu ka jawaabayaa su’aashooda isaga oo u sheegaya sida ay mucjisadani ku dhacday. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 2:22.

▣ **“oo aad iskutallaabta ku qodobteen.”** Tani waxa ay ahayd xaqiiqo cad muuqata. Iyagu waxay masuul ka ahaayeen dhimashadiisa. Fiiro u yeelo “idinka” sida ku sugan aayadda 11, taasoo sheegeysa dembigooda.

▣ **“oo Ilaah ka sara kiciyey”** Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa in saddexda qof ee Saddexmidnimadu ay shaqaynayaan sarakiciddii Ciise:

1. Ruuxa, Room. 8:11

2. Ciise, Yooxanaa 2:19-22; 10:17-18

3. Aabbaha, Fal 2:24,32; 3:15,26; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30,33,34,37; 17:31; Rooma. 6:4,9

Tani waxa ay ahayd ansixinta runta Ciise noloshiisa iyo waxbaristiisa ku saabsan Ilaah iyo sidoo kale aqbalitaanka buuxa ee Ciise dhimashadiisa beddelka denbiyada ah. middani waxa ay ahayd arrinta ugu muhiimsan ee *Kerygma* (i.e., wacdimaha Falimaha Rasuullada, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14).

▣ **“ninkanu isagoo bogsaday halkan hortinna ah ku taagan yahay.”** Waxa shaqaynaya ereyga “taagni.” Ninkii curyaanka ahaa waa uu taagan yahay isagoo hortooda taagan.

▣ **4:11** waa xigasho ka ahaatay Sabuurka. 118:22, laakiin aan ka ahaanin qoraalka Masoriga ama Sebtuujiangiga (cf. Efesos. 2:20; I Butros. 2:4ff). Ciise middan isaga ayaa shakhsiyaddiisa u adeegsaday sida ku sugan Markos 12:10 iyo Luukos 20:17, isagoo kasoo qaatay Sebtuujiangiga. Waxa ay tusinaysaa dhammaystirka waxsii sheegyadii Axdiga Hore oo ku saabsan Masiixa la diidayo ee noqday qorshaha Ilaah ka leeyahay badbaadinta abidka ah (eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8) ee Israa’iil iyo dunida oo dhan. Middanina waxa ay ahayd hadal layaab ku ah hoggaamiyayaashii Yuhuudda (cf. I Timoteyos. 2:5).

▣

NASB

“madaxa rukunka”

NKJV

“rukunka madaxa mumiimka ah”

NRSV, NJB

“rukunka muhiimka ah”

TEV

“dhagaxa. .ka ugu muhiimsan”

MAWDUUC GAAR AH: DHAGAXGEESEEDKA

I. Adeegsigiisii Axdigoo Hore

A. Ujeedka sida dhagaxu adayg badan yahay u sii jiri karo oo uu aasaas wanaagsan u sameeyay ayaa YHWH lagu magacaabay (Sabuurrada 18:2).

B. Waxaa lagu horumariyey macaga Masiixa (cf. Bilowgii 49:24; Sabuurrada 118:22; Ishacyaah 28:16).

C. Waxa ay u taagan tahay Xukun ka yimid YHWH oo u timid Masiixa (cf. Ishacyaah 8:14; Daanyeel 2:34-35, 44-45).

D. Middani waxa ay ku hour martay in ay tusaale u noqoto dhismaha.

1. Dhagax aasaas ah, meeshii ugu horraysay, ee ammaanka ahayd ee ay malaa’igtu ka fadhiisato dhismaha oo loogu yeero “Dhagaxgeeseedka”

2. Waxay sidoo kale moqon kartaa dhagaxa ugu dambeeya ee meel la dhigo, ee isku qabta derbiyada (Sakariyaah 4:7; Efesos 2:20,21), oo loogu yeero “the cap stone” oo macnaheedu dhagaxa madaxa ah oo ka yimid erey Cibraani ah *rush* (madax)

3. Waxa uu noqon karaa “dhagaxa hore” ee yaalla badhtamaha jidka waddada ee qabata derbiga oo dhan.

II. Adeegsiyadiisa Axdiga Cusub.

A. Ciise wuxuu ka soo xigtay Sabuurrada 118 marar badan isagoo naf ahaantiisa isku sheegaya (cf.

Matayos 21:41-46; Maarkos 12:10-11; Luukos 20:17)

- B. Bawlos wuxuu isticmaalayaa Sabuurada 118 isagoo ku xiriirinaya diidmadii Israa'iil ay fallaagonimadeedii iyo rumaysad la'aanteedii ku doodday YHWH (cf. Rooma 9:33)
- C. Bawlos wuxuu fikirka "dhagaxa hore" ku adeegsaday Efesos 2:20-22 isagoo ka wada Masiixa
- D. Butros wuxuu ujeedkan u adeegsaday Ciise middan oo ku jirta I Butros 2:1-10. Ciise waa Dhagaxgeeseedka rumaystayaashuna waa dhagaxa nool (rumaystayaashu waa macbudyada, I Korintos 6:19), kuwaasoo uu Isagu dhisay (Ciise waa macbudka cusub, cf. Maarkos 14:58; Matayos 12:6; Yooxanaa 2:19-20).

III. Warbixinnada fiqi ahaaneed

- A. YHWH wuxuu Daa'uud iyo Sulaymaan u oggolaaday in macbud dhisaan. Wuxuu u sheegay in haddii ay axdiga xajiyaan uu barakdayn doono lana joogi doono iyaga, laakiin haddii ayan yeelin, macbudku uu hallaabi doono (cf. I Boqorrada 9:1-9)!
- B. Yuhuudda Rabbaaniyiinta ahu waxa ay diiradda saareen xagga wanaagga oo la dayacay sababtii rumaysadka ee shaqsi ahaaneed (tani ma aha war bxin daah saaran yahay; waxaa jiray Rabbaayiin Ilaah aaminsan). Ilaah maalin kasta ayuu doondoona dadka, xiriirka ilaahiga ah la leh kuwa uu isagu araggiisa ka abuuray (Bilowgii 1:26-27). Luukos 20:17-18 waxaa ku jira ereyo laga naxo oo ku saabsan xukunka.
- C. Ciise Masiix wuxuu qaabka macbudka u adeegsaday in uu u taagan yahay muuqaalkii jidh ahaaneed. Way sii socotaa oo waxay ku baahdaa ujeedka shaqsi ahaan. Rumaysadka Masiixa ayaa ah fure xidhiidh lagula yeelan karo YHWH.
- D. Badbaado macnaheedu waxaa weeye in Ilaah uu araggiisii dib ugu soo celiyo aadanaha si weheshi ay laah la yeeshaan uu suurto gal u boqdo. Hadda yoolka Masiixiyaddu waa U-ekaanta-Maxsiixa. Kuwa rumaysadka lahu waa in ay noqdaan dhagaxyo nool oo lagu dhisay oo Masiixu jaan gooye u yahay. Macnaha in ay noqdaan (Macbud cusub).
- E. Ciise waa aasaaska iimaankeenna iyo dhagaxa madaxa u ah iimaankeenna (waa Alpha iyo Omega "jira weligiina jiri doona"). Weliba wuxuu noo yahay dhagaxa wax celiya iyo dhagaxa difaaceenna. In aan isaga weynno waa in aan wax walba weynnay. Halkani ma laha boos dhexe!

4:12 "Mid kale badbaadada lagama helo" Waa diidmo laban laaban oo xooggan. Badbaado laguma heliya Ibraahim ama Muuse (cf. Yooxanaa 14:6; I Timoteyos. 2:5; I Yooxanaa 5:10-12). Waa sheegasho layaab leh! Waxa cad in Ciise uu ogsoonaan iyada qof kastaa uu xidhiidhka Ilaah ku helo haddii uu isaga soo maro. Butros waxa uu si cad middan uugu sheegay hoggaamiyayaashii Yuhuudda. Waxa middan loogu yeedhay yaab gelinta gaarka ah ee Masiixiyadda. Waxa la qariyaa halkan kuma jiro. Hadalkanina waa run ama Masiixiyadda ayaa been ah!

▣ **"ma jiro magac kale samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyey"** falka tilmaamaya sida wax u dheceen "loo bixiyay" waa fal dhammays tiran oo mafcuulku horreeyo. Ilaah ayaa middan doortay! Ciisena waa jawaabta ruuxi ahaaneed ee aadanuhu u baahi qabaan, mana jiro qorshe labaad. Kitaab wanaagsan oo ku saabsan arrintan waxaad ka eegtaa H. A. Netland, *Dissonant Voices: Religious Pluralism and the Question of Truth*.

▣ **"dadka dhexdooda"** fiiro u yeelo arrinta caalamiga ah (cf. Yooxanaa 3:16; I Timoteyos. 2:4; II Butros. 3:9).

▣ **"oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno."** Jumladani waxay wadataa laba ficil.

1. *dei*, fal wakhti xaadirka jooga oo wax tusinaya, "waajib inoo ah" (eeg firada *dei* ee 1:16)
2. *sōthēnai*, fal tegay mafcuulkuna soo horreeyo of *sōzō*, "badbaadno"
Ereyga "badbaad" labo adeegsi ayuu ku dhex leeyahay Axdiga Cusub.
 1. badbaado jidh ahaaneed (macne Axdiga Hore ah, cf. Matayos. 9:22; Markos 6:56; Luukos 1:71; 6:9; 7:50; Fal 27:20,31; Yacquub 1:21; 2:14; 4:12; 5:20)
 2. badbaado ruuxi ahaaneed (adeegsiyada Axdiga Cusub, cf. Luukos 19:10; Fal 2:21,40,47; 11:14; 15:11; 16:30-31)

Ninka curyaanka ahi labadaba wuu arkay. Hoggaamiyayaasha diintu waxay u baahnaayeen inay Ciise ka dhigtaan rajadooda keliya ee lagu aqbali karno cafisna ay ku helayaan. Aadanahuna waxa uu u baahan yahay in la badbaadiyo (cf. Rooma. 1:18-3:20) Ciisena waa jidka keliya ee middani ku imanayso (cf. Rooma. 3:21-31). Xigashada Axdiga Hore ah ee ku sugan aayadda 12 waxay tusinaysaa inuu Isagu markastaba ahaa qorshaha Ilaah (cf. Ishacyaah. 8:14-15; 28:14-19; 52:13-53:12).

NASB (UPDATED) TEXT: 4:13-22

¹³Markay arkeen Butros iyo Yooxanaa dhiiranaantoodii. oo ay garteen inay yihiin niman aan wax baran, jaahiliinna ah, ayay yaabeen; markaasay garteen inay Ciise la joogi jireen. ¹⁴Markay arkeen ninkii la bogsiiyey oo la taagan iyaga, waxba way ka odhan kari waayeen. ¹⁵laakiin intay amreen inay shirka dibadda uga baxaan. ayay wada hadleen iyagoo leh, ¹⁶Maxaynu nimankan ku samaynaa'? waayo, inay calaamo caan ah faleen waa u muuqataa kuwa Yerusaaalem jooga oo dhan: mana dafiri karno. ¹⁷laakiin si ayan dadka ugu sii faafin, aynu cabsiinno si ayan hadda ka dib magacan ninna ugula hadlin. ¹⁸Markaasay u yeedheen oo ku amreen inayan aslanba Ciise magiciisa ku hadlin, waxna ku barin. ¹⁹laakiin Butros iyo Yooxanaa ayaa u jawaabay iyagii oo ku yidhi, Idinku kala xukuma inay Ilaah hortiiisa ku qumman tahay inaannu idinka idin maqallo intaannu Ilaah maqli lahayn, iyo in kale; ²⁰waayo, waxyaalihii aannu aragnay oo maqallay iskama dayn karno inaannu ka hadalno. ²¹Markaasay, intay sii cabsiiyeen, sii daayeen, waayo, waxay waayeen waxay ku taqsiiraan, dadka aawadiis; maxaa yeelay, dadkii oo dhammu waxay Ilaah ku ammaaneen wixii la sameeyey. ²²Waayo, ninkii calaamadan lagu bogsiiyey waa ka weynaa afartan sannadood.

4:13 “dhiiranaantoodii” eeg Mawduuca Gaarka ah: dhiiranaan (*parrhēsia*) 4:29.

▣ **“aan wax baran”** ereygani waa *agrammatos*, oo ah “wax qoris” meel qorista lagu barto. waxa middan loogala jeedi karaa:

1. jaahil ama aan waxbaran (cf. Moulton, Milligan, *Vocabulary*, p. 6)
2. aan tabo bar kusoo qaadan dugsiga rabbaaniga (cf. A. T. Robertson, *Word Pictures in the Greek New Testament*, vol. 3, p. 52 iyo Louw and Nida, *Lexicon*, vol. 1, p. 328)

▣ **“jaahiliinna ah”** waa ereyga *idiōtēs*, oo hadiyo goor loo tarjumay “xirfad laawe” ama “aan wax khibrada lahayn.” asal ahaan waxa ay tilmaamaysaa qof caadi ah oo kasoo horjeeda hoggaamiye ama qof aqoon leh. Waxa loo adeegsan karaa qof bannaanka ka yimid oo kasoo horjeeda qof koox xubin ka ah (cf. I Korintos. 14:16,23-24; II Cor. 11:6).

U fiirso sida ay tarjumaadaha Ingiriisida ee kala duwani ereyadan uula kala tacaaleen.

NASB, NKJV	“aan waxbaran oo jaahil ah”
NRSV	“aan wax baran oo ah dad caadi ah”
TEV	“dad caadiya oon waxba baran”
NJB	“xirfad laawe aan wax baran”

▣ **“ayay yaabeen”** waa fal aan dhammays tirnayn oo wax tusinaya. Waxa ay tusinayaan mid ahaan bilowga falka ama fal soo noqnoqonayay wakhti tegay. Luukos ereygan badanaa wuu adeegsanayaa (18 jeer Luukos iyo Falimaha Rasuullada); waa badanaa oon ahayn markasta, waanay isla xidhiidhaan (cf. Luukos 11:38; 20:26; Fal 4:13; 13:41).

▣ **“markaasay garteen inay Ciise la joogi jireen”** tani waa xaqiiqo ku dhex jirta eedayn. Ciise sidoo kale waxa uu ahaa midaan tabo bar ku qaadan dugsiga rabbaaniyiinga, haddana Axdiga Hore si fiican ayuu u yaqaanay. Waxa uu xaadiray sinagooga dugsigiisa isagoo ah ilmo yar (sida Butros iyo Yooxanaa) oo carruurta yaryarna waa laga rabay sidaas.

Hoggaamiyayaashani waxay garawsadeen dhiirranaanta iyo awoodda Butros iyo Yooxanaa, waxaanay u arkeen sidii oo ay la mid yihiin Ciise.

4:14 qofkastaa wuu garanayay ninka curyaanka ah maxaa yeelay si joogto ahuu u fadhiisan jiray albaabka Macbadka maalin kasta. Laakiinse hadda kaddib fadhiisan maayo! Dadka badan ee Macbadka joogaana maaha kuwo diidi kara arrintan (aayadaha 16,22).

4:15 Saddexdoodaba waxay u sheegeen inay iska tagaan iyaga oo falaqaynaya wixii ay samayn lahaayeen iyo qorshahooda diidmada ah (aayadaha 17-18).

4:17-18 Middani waxay ahayd qorshahooda. Joojiya ka hadlitaanka wax ku saabsan Ciise sidoo kalena joojiya in magaciisa dadka lagu caawiyo! Ka waran bal dhammaanba dadka Ilaah ku ammaanayay bogsiinta (cf. 3:8-9; 4:16)?

4:19 “**intaannu**” waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah, taasi oon loo adeegsanin xaqiiqo, laakiin doodda aawadeed. Butros iyo Yooxanaa kamay fikirin in amarradoodu jiraan (5:28).

▣ “**qumman tahay**” eeg Mawduuca Gaarka ah: 3:14.

▣ “**kala xukuma**” waa fal wakhti tegay ah oo amar ah. hoggaamiyayaashani iyaga ayaa isku xukumay afkooda, ujeeddooyinkooda, iyo camalladdooda.

4:20 Butros iyo Yooxanaa waxay sheegayaan iyagoon diidi karin khibrad la'aantooda balse aanay joojinaynin wadaagitaankeeda!

4:21 “**intay sii cabsiiyeen**” Waxa aan la yaabaa waxa ay uugu hanjabeen inay samayn doonaan. Ciise waxa laga sara kiciyay kuwa dhintay. Ninka waxa laga sara kiciyay sariirtisii; maxay haddaba hoggaamiyayaashani ku samayn dooneen Butros iyo Yooxanaa?

▣ “**waxay waayeen waxay ku taqsiiraan**” waxa laga yaabaa in middani ay tilmaamayso mid ka mida ujeeddooyinka Luukos ee qoraalkiisa. Masiixiyaddu kumay ahayn liddii Roomaanka ama nabadda Yerusaaalem. Xitaa Sanhadriinku may helaynin wax ay ku xukumaan hoggaamiyayaashooda.

▣ “**dadka aawadiis**” markhaatiyaasha dhacdooyinkii Yerusaaalem dhexdeeda waxay kaniisaddii ugu horraysay siiyeen dareen sarreeya (2:47). Hoggaamiyayasha Yuhuudduna waxay ka cabsadeen dadkan badan (5:13,26).

NASB (UPDATED) TEXT: 4:23-31

²³Markii la sii daayay ayay intoodii kale u yimaadeen oo uga warrameen wixii wadaaddada sare iyo waayeelladu ku yidhaahdeen oo dhan. ²⁴Oo markay taas maqleen, iyagoo isku wada qalbi ah, ayay codkoodii sare ugu qaadeen Ilaah oo yidhaahdeen, Rabbiyow, adigu waxaad tahay kan sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa ku jira oo dhan; ²⁵kii Ruuxa Qoduuska ah kaga hadlay afkii awowahayo Daa'uud oo ahaa midiidinkaagii oo yidhi, Quruumuhu maxay u cadhoodeen, Dadkuna maxay ugu fikireen wax aan waxba ahayn? ²⁶Boqorrada dhulku col bay u taagnaayeen. Taliyayaashuna intay is-urursadeen Ayay waxay caasi ku noqdeen Rabbiga iyo Masiixiisa; ²⁷waayo, waxaa run ah in magaaladan gudaheeda Herodos iyo Bontiyos Bilaatos oo ay la jiraan dadka aan Yuhuudda ahayn iyo dadka reer bini Israa'iil iyagoo ka gees ah Ciise Midiidinkaaga qoduuska ah, oo aad subagtay, ay isu urursadeen, ²⁸inay sameeyaan wax alla wixii gacantaada iyo taladaadu hore u gooyeen inay noqdaan. ²⁹laakiin Rabbiyow, eeg, way na cabsiinayaan e; haddaba addoommadaada sii dhiiranaan oo dhan oo ay hadalkaaga ku sheegaan, ³⁰intii aad gacantaada u soo fidinaysid si aad ugu bogsiisid, si calaamooyin iyo yaabab ugu samaysmaan magaca Midiidinkaaga qoduuska ah Ciise. ³¹Oo markay tukadeen dabadeed, meeshay ku urursanaayeen baa gariirtay; oo dhammaantood waxaa ka wada buuxsamay Ruuxa Qoduuska ah, oo hadalkii Ilaah bay dhiiranaan ugu hadleen.

4:23 Waxa ay dib uugu laabteen Qolladdii Sare si ay uula kulmaan xerta.

4:24 “isku wada qalbi ah” isku duubnaanka maanka iyo qalbiga waxay calaamad u ahayd kaniisaddii ugu horreysay (cf. 1:14; 2:46; 4:24; 5:12; 15:25). Waxa jirta awood ruuxi ahaaneed iyo waxqabad midnimo oo isku ujeeddo ah.

▣ **“Rabbiyow”** tani waa ereyga Giriigga ah ee *despota*, waana midda uu ka yimid ereyga Ingiriisida ah ee despot. Waxa ay tusinaysaa qof leh awood buuxda! Halkanna waxa ay ku sheegeysaa Ilaah Aabbaha ah (cf. Luukos 2:29 iyo Muujintii. 6:10). Sidoo kalena waxa loo adeegsaday Ciise (cf. II Butros. 2:1 iyo Yuudas, aayadda 4).

▣ **“adigu waxaad tahay kan sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa ku jira oo dhan”** waxa laga yaabaa in middani hadal dadban u tahay Baxniintii 20:11. Sidoo kalena waxa lagu soo xigtay 14:15 xaqiiqadana waxa lagu sheegay 17:24. YHWH waa khaaliqa!

4:25 waxa jira akhrisyo kala duwan oo ah qaybta ugu horreysa aayaddan. Qoraal gacmeedka ugu da'da wayn P⁷⁴, κ , A, iyo B waxa ay keenayaan kala duwanaanshahan. Inkasta oo ereyaynta saxda ah aan la hubin, qoraalka muhiimaddiisu way muuqataa. Diiwaan gelin buuxda oo ku saabsan dhibaataada iyo aragtiyaha waxa dhacay, ka eeg Bruce M. Metzger, *A Textual Commentary on the Greek New Testament*, pp. 321-323).

▣ **“kii Ruuxa Qoduuska ah kaga hadlay afkii awowahayo Daa'uud”** waxa middani ay tilmaamaysaa waxyiga Axdiga Hore (cf. Matayos. 5:17-19). Waa xigasho ka ahaatay Sebtuujantiga Sabuurka 2:1-2, Sabuurka boqortooyada Masiixa. Masiixiyaddu maaha wax cusub, laakiin waa dhammaytirka Axdiga Cusub (cf. Matayos. 5:17-48). Mucaaradnimada dunida waa in la fisho, laakiin waxa iyana meesha taalla guusha YHWH.

4:25-26 “Quruumaha. . .dadka. . .boqorrada. . .taliyayaasha” waxay u muuqataa in xertu ay isku xidhaan erayo rabbaani ah oo iskaashanaya “taliyayaal.” Dhinac waxa ay kala hadlayaan Senhadriinka *Goyim* ama ugu yaraan waxay isla xidhiidhinayaan magacyo Axdiga Hore oo dhinacyo iska soo horjeeda (Bilaatos, Herodos, Sanhadriin, iyo dad Yuhuuda) kuwaasoo ka qayb qaatay maxkamadayntii Ciise iyo iskutalaab ku qodbitaankii.

▣ **“caasi”** macne ahaan waa “qof oo la caasiyo.” Waxa ay tusinaysaa kibir.

▣ **4:26 “Rabbiga iyo Masiixiisaba”** Fiiro u yeelo in YHWH iyo Masiixu ay si wada jire u hadleen. Waxa aan la yaabay iyagoon soo xiganin Sabuurka 110:1.

Waxa adag in la noqdo muwaxidiin (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:39) iyo in la sheego ilaahnimada iyo Masiixa iyo shakhsnimada Ruuxa Spirit (cf. aayadda. 25, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:32). Haddana saddexdan shakhsiba waxay ay ku midaysan yihiin macnayaal dhowra oo ku sugan Axdiga Cusub dhexdiisa. Xasuusno in dhammaanba qorayaashu marka laga reebo Luukos ay ahaayeen kuwo muwaxidiin ah oo ahaa Masiixiyiin Yuhuud ah. Wax la yaab leh ayaana ku sababay inay sheegaan saddexda midaysan. Eeg Mawduuca Gaarka ah. 2:32.

▣ **4:27 “Ciise Midiidinkaaga qoduuska ah, oo aad subagtay”** Fiiro u yeelo magacyada la xidhiidha Masiixa.

1. quduus (cf. 3:14; 4:30)
2. midiidin (*pais*, cf. 3:13,26; 4:25,27,30. Eeg fiirada 3:13)
3. la subkay (*chriō*, oo lagasoo kexeeyay Masiix, cf Luukos 4:18; Fal 4:27; 10:38)

Aayaddani waxay sheegeysaa siyaabo dhowra oo Ciise Ilaah usoo diray awoodna u siiyay. Ciise waa qorshaha Ilaah ee abidka ah waana nidaamka badbaadada iyo dib usoo celinta (aayadda 28, eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8).

MAWDUUC GAAR AH: SUBKIDDA KU JIRTA BAYBALKKA (BDB 603)

- A. Waxaa loo adeegsaday qurxin (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 28:40; Ruut 3:3; II Samuu'eel 12:20; 14:2; II Boqorrada 28:15; Daanyeel 10:3; Caamoos 6:6; Miikaah 6:15)
- B. Waxaa loo adeegsaday martida (cf. Sabuurrada 23:5; Luukos 7:38,46; Yooxanaa 11:2)
- C. Waxaa loo adeegsaday bogsiin (cf. Ishacyaah 6:1; Yeremyaah 51:8; Markos 6:13; Luukos 10:34; Yacquub 5:14) [waxaa loo adeegsaday hab nadaafadeed sida ku jirta Yexesqeel 16:9]
- D. Waxaa loo adeegsaday u diyaarinta aaska (cf. Bilowgii 50:2; II Boqorrada 16:14; Markos 16:1; Yooxanaa 12:3,7; 19:39-40)
- E. Waxaa loo adeegsaday hab diin ahaaneed (cf. shay ay tahay in la sameeyo, cf. Bilowgii 28:18,20. 31:12 [tiir ama rugni]; Baxniintii 29:36 [maasha qudduuska ah]; Baxniintii 30:26; 40:9-16; Laawiyiintii 8:10-13; Tirintii 7:1 [Teendhada])
- F. Waxaa loo isticmaalay soo xaraynta hoggaamiyeyaasha
 1. Wadaaddada
 - a. Haaruun (Baxniintii 28:41; 29:7; 30:30)
 - b. Haaruun wiilashiisii (Baxniintii 40:15; Laawiyiintii 7:36)
 - c. Erey magac ahaan loo adeegsan jiray (Tirintii 3:3; Laawiyiintii 16:32)
 2. Boqorrada
 - a. Xag Ilaah (cf. I samuu'eel 2:10; II samuu'eel 12:7; II Boqorrada 9:3,6,12; sabuurrada 45:7; 89:20)
 - b. Xagga nebiyada (cf. I samuu'eel 9:16; 10:1; 15:1, 17; 16:3,12-13; I Boqorrada 1:45; 19:15-16)
 - c. Xagga wadaaddada (cf. I Boqorrada 1:34,39; II Boqorrada 11:12)
 - d. Xagga hogaamiyeyaasha (cf. Xaakinnada 9:8,15; II samuu'eel 2:7; 5:3; II Boqorrada 23:30)
 - e. Ciise in uu yahay Masiixa ah boqorka (cf. sabuurrada 2:2; Luukos 4:18 [Ishacyaah 61:1]; Falimaha Rasuullada 4:27; 10:38; cibraaniyada 1:9[Sabuurrada 45:7])
 - f. Kuwii Ciise raacsanaa (cf. II Korintos 1:21; I Yooxanaa 2:20,27 [*chirisma*])
 3. Sida macquulka ah nebiyada (cf. Ishacyaah 61:1)
 4. Qalab rumaysad darrada loogu soo jiido xagga Ilaah
 - a. Kuuros (cf. Ishacyaah 45:1)
 - b. Boqorkii Turos (cf. Yexesqeel 28:14, halkaasoo uu adeegsanayo tilmaamaha Edom)
 5. Erey ama Magac "Masiixa" macnihiisu waa "midka la subkay" (BDB 603)

▣ **"ay isu urursadeen, iyagoo ka gees ah Midiidinkaaga goduuska"** halkan waxa ahaaday diiwaanka kuwo ka Yerusaaalem dhexdeeda Ciise kaga gees ahaa.

1. Herodos, kii Roomaanku u magacaabeen inuu ahaado badhasaabka Falastiin (eeg Mawduuca Gaarka ah ee hoos ku xusan).
2. Bontus Bilaatos, hoggaamiyihii maamulka Roomaanka ee Falastiin (eeg Mawduuca Gaarka ah 3:13).
3. Quruumaha, oo laga yaabo inay sheegayso ciidankii Roomaanka ama Yuhuuddii kale.
4. "dadka Israa'iil" oo loogala jeedi karo taliyayaashii Yuhuudda iyo dadkii badnaa ee Yuhuudda ahaa ee dalbaday in la siidaayo Barabbaas Ciise iskutallaabtaa lagu qodbo.

MAWDUUC GAAR AH: QOYSKII HERODOSKII WAYNAA

- A. Herodoskii Waynaa
 1. Boqorkii Yahuudiya (37-4 C.H.), reer Edom, oo dano siyaasadeed aawadood iyo taageerada Mark Antony, loogu magacaabay taliyaha qayb wayn oo ah Falastiin (Kancaan) una magacaabeen hoggaankii Roomaanku sanadkii 40 C.H.
 2. waxa lagu dhexsheegay Matayos. 2:1-19 iyo Luukos 1:5
 3. Wiilashiisii

- a. Herod Philip (wiilkii Mariamne tii Simon)
 - (1) xaaskii Herodias (4 C.H. - C.D. 34)
 - (2) waxa lagu xusay Matayos. 14:3; Markos 6:17
 - b. Herod Philip I (ina Cleopatra)
 - (1) Tetrarch kii agagaarka woqooyiga iyo galbeedka Badda Galile (4 C.H - C.D. 34)
 - (2) waxa lagu dhex xusay Luukos 3:1
 - c. Herod Antipas
 - (1) Tetrarch kii Galilee iyo Perea (4 C.H - C.D. 39)
 - (2) waxa lagu dhex xusay Matayos. 14:1-12; Markos 6:14,29; Luukos 3:1,19; 9:7-9; 13:31; 23:6-12,15; Fal 4:27; 13:1
 - d. Archelaus, Herod kii Ethnarch
 - (1) badhasaabkii Yahuudiya, Samariya, iyo Idumea (4 C.H. - C.D. 6)
 - (2) wxa lagu xusay Matayos. 2:22
 - e. Aristobulus (ina Mariamne)
 - (1) waxa la sheegay inuu ahaa Herod Agrippa I aabbihiis oo ahaa
 - (a) Boqorka Yahuudiya (C.D. 37-44)
 - (b) waxa lagu dhex xusay Fal 12:1-24; 23:35
 - (i) wiilkiisu wuxuu ahaa Herod Agrippa II
 - Tetrarch kii carriga woqooyiga (C.D. 50-70)
 - (ii) gabadhiisu/inantiisu waxay ahayd Bernice
 - la shaqeeyihii walaalkeed
 - waxa lagu dhex xusay Fal 25:13-26:32
 - (iii) gabadhiisu/inantiisu waxay ahayd Drucilla
 - naagtii Felix
 - waxa lagu dhex xusay Fal 24:24
- B. Maraajicda kitaabiga ah ee laga heli karo Herodos
1. Herodos Tetrarch kii, waxa lagu sheegay Matayos :1ff.; Luukos 3:1; 9:7; 13:31, iyo 23:7, waxa uu ahaa wiilkii Herodoskii Waynaa. Markii uu dhintay Herodoskii Waynaa, boqortooyadiisii waxay ku qaybsantay wiilashiisa dhexdooda. Ereyga “Tetrarch” waxa weeyi “hoggaamiyaha afar meeloodow meel.” Herodos waxa loo yaqaanay Herodos Antipas, oo lagasoo gaabsaday Antipater. Waxa uu maamulay Galiili iyo Periya. Tan macneheeduna waa in Ciise adeeggiisii uu ahaa facii labaad ee xaakinkii Idumiyaanka.
 2. Herodias waxay ahayd inantii Herod Antipas walaalkii, Aristobulus. Sidoo kale waxa hore u guursaday Philip, oo ay walaalo ahaayeen Herodos Antipas. Kani muu ahayn Philip Tetrarch oo ka talinayay agagaarka woqooyiga Galiili, laakiin waa Philip walaalkiis, oo ku noolaa Rooma. Herodias waxa ay gabadh u dhashay Philip. Markii Herodos Antipas uu booqday Rooma ayuu la kulmay waxaana qasbay Heroditas oo raadinayay siyaasad. Sidaas darteedna Herodos Antipas wuu furay naagtiisii oo ahayd amiirada Nabatiyaana kaddibna Herodias iyana waxay iska furtay Philip si ay u guursato Herodos Antipas. Sidoo kalena waxay walaalo ahaayeen iyada Herodos Agrippa I (Fal 12).
 3. Magaca Herodias gabadheeda, Salome, waxa kitaabkiisa inagu baraya Flavius Josephus *The Antiquities of the Jews*8:5:4. Mar kan da’deedu waxa ay ahayd inta u dhaxaysa labo iyo toban ilaa toddobo iyo toban. Waxa iyada gacanta ku haysay hooyadeed, markii dambena waxay guursatay Philip Tetrarch, laakiinse inyar kaddib carmal bay noqotay.
 4. Ku dhowaad toban sanadood dilaankii Yooxanaa Baabtiisaha, Herodos Antipas wuxuu tegay Rooma si naagtiisa Herodias loogu raadiyo magac boqor maxaa yeelay Agrippa I, walaalkeed ayaa helay magaca. Laakiin Agrippa I Rooma ayuu dacwad u gudbiyay isagoo Antipas ku eedeynaya, inuu iskaashi la sameeyay Parthians ka, oo ahaa cadaw Roomaanka ay is necebyihiin kana soo jeeday Mesobatamiya. Boqorkii waxa uu rumaystay Agrippa I sidaasi darteedna Herodos Antipas iyo naagtiisii Herodias waxa loo musaafuriyay Spain.

5. Si loo kala garto Herodos yadan kala duwan sida loogaga hadlay Axdiga Cusub, waxa Herodoska Wayn lagu xasuusan karaa isagoo ahaa kii carruurta ku laayey Beytlaxam; Herodos Antipas isna waa kii dilay Yooxanaa Baabtiisaha; Herodos Agrippa isna wuxuu dilay Rasuul Yacquub; Herodos Agrippa II isna wuxuu wax ka maqlay codsiga Bawlos ee ku sugan Falimaha Rasuullada.
- C. Wax ku saabsan warbixinta asal ahaaneed ee Herodoskii Waynaa, ka eeg Flavius Josephus, *Antiquities*

4:28 “wixii gacantaada iyo taladaadu hore u gooyeen inay noqdaan” xitaa ka hor abuurka Ilaah waxa uu lahaa qorshihiisa ku waajahan badbaadada (cf. Matayos. 25:34; Yooxanaa 17:24; Efesos. 1:4; I Butros. 1:20; Muujintii. 13:8; Fal 2:13; 3:18; 13:29). Cadaawayaasha Ciisena waxa keliya oo ay sameeyeen wixii Ilaah ka rabay in ay sameeyaan. Ciise waxa uu u yimid inuu dhinto (cf. Markos 10:45). Ereyga loo tarjumaya “gooyeen” waa meeleyaha “ka hor” (cf. Rooma. 8:29,30; I Korintos. 2:7; Efesos. 1:5,11).

Ereyeda ku saabsan qadarka ee Axdiga Cusub waxa laga heli karaa Rooma. 8:28-30; Rooma. 9; and Efesos. 1:3-14. Aayadahanina waxa ay sheegayaan oo tusinayaan awoodda Ilaah ee buuxda. Isaga ayaa waxkasta maamulaya, xitaa taariikhda dunida. Waxa jira qorshe badbaadada ku waajahan oo ilaahiya horena loo sii dejiyay. Si kastaba ha ahaatee, qorshahani maaha mid sabab la’aan lagu dejiyay ama doorasho ku dhisan. Waxa lagu saleeyay awoodda Ilaah iyo cilmigiisa qaybka ah, laakiin sidoo kalena waxa uu ku dhisan yahay dabeecaddiisa ku dhisan jacaylka, naxariista iyo nimcada aynaan mutaysan.

Waa inaan ka digtoonaano dhaqankeenna reer galbeedka ama midabaynteenna haddii aan nahay evangelical aan ku salaynayno xaqiiqada cajiibka ah. Sidoo kale waa inaan iska ilaalinno dhacdooyinka taariikh ahaaneed, fiqi ahaaneed iyo khilaafaadka u dhexeeya Augustine iyo Pelegius ama Kalfaniisamka iyo Armiinayaanka.

Qadarku maaha caqiido macneheedu ka dhiganyahay inay xadaynayso jacaylka Ilaah, nimcadiisa, iyo naxariistiisa ama ay injiilka ka fogenaso inuu qof kusoo biiro. Waxa loogala jeedaa inay rumaystayaasha ku xoogeysa aragtida ay ka qabaan dunida. Jacaylka Ilaah waxa uu u ahaaday dhammaanba aadanaha (cf. I Timoteyos. 2:4; II Butros. 3:9). Ilaah wax kasta isaga ayaa gacanta ku haya. Kuma ama maxay ayaa isaga inaga sooci kara (cf. Rooma. 8:31-39)? Qadarku waxa uu sababaa in nolosha labo siyaabood midkood loo arko. Ilaah oo taariikhda oo dhan ka muuqanaya isagoo dhex jooga. Aadanuhuna waa kuwo wakhtigoodu kooban yahay. Dhinaca aan wax ka eegayno iyo caqligeennuba waa ay xadidanyihiin. Awoodda Ilaah iyo doonista xorta ah ee aadanahuna maaha kuwo is khilaafaya ama iska hor imanaya, laakiinse waa qaab ku dhisan axdi. Tanina waa xaqiiqo kale oo tusaale u ah waxyaalaha uu kitaabku ina toosinayo. Caqiidooyinka Kitaabiga ahna waxa loo soo kala jeediyaa dhinacyo kala duwan, waxaanay hadiyo goor u muuqdaan kuwo iskasoo horjeeda. Xaqiiqadu waa isu dheelli tirka waxyaalaha u muuqda in ay iskasoo horjeedaan. Waa in aynaan dareenka inaga oo qaadanayna mid ka mid xaqiiqooyinka. Waa in aynaan faquuqin xaqiiqo kasta oo kitaabka dhexdiisa ku sugan.

Sidoo kale waxa muhiim ah in ujeedada doorashada aan ku darsano iyadoon ahayn keliya helitaanka janno marka aan dhimano, balse ay tahay lamidnimada Masiixa ee hadda (cf. Efesos. 1:4; 2:10)! Waxa la inoo doortay inaan ahaanna “quduus iyo kuwo canaan ka madhnaada.” Ilaah waxa uu inoo doortay inuu inna beddelo si kuwa kale u arkaan isbedelkan isla markaana ugu jawaab celiyaan rumaysad Ilaah ee ku imanaya Masiixa. qaddarkuna maaha faa’ido shakhsi ahaaneed oo gaar ah, laakiinse waa masuuliyad axdi ahaaneed! Waxa la inoo badbaadiyay inaan adeegno! Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:47.

4:29 “oo ay hadalkaaga ku sheegaan” waa fal wakhti xaadirka jooga. Waxa weeyi baryitaan lagu rabo dhiirraanaan joogto ah (cf. Efesos. 6:19 iyo Kolosay. 4:3) iyo sheegitaanka ruuxu hagayo (cf. II Timoteyos. 3:15-17).

▣
NASB “dhiirraanaan oo dhan”
NKJV, NRSV,
TEV “dhiirraanaan kasta”
NJB “cabsi la’aan kasta”
 Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: GEESINIMO/DHIIRANAAN (*PARRĒSIA*)

Weedhan dhafan ee afka Giriiga waxay tahay “dhammaan” (*pan*) iyo “ haddal” (*rhēsis*) madaxbaaninadan ama dhiiranaanta xagga haddalka waxay badiyaaba muujinaysaa geesinimo waloow ay jirto mucaaradnimo iyo diidmo ka dhan ahi(Yooxaana 7:13;1 Tesoloniika 2:2)

Qoraalda Yooxaana waxaa tani lagu isticimaaly (13 jeer) waxaay badiyaaba qeexaysaa bayaan rasmiya oo dadweynaha la gaadhsiiyay(Yooxaana 7:4; iyo waliba qoraaladii Bawlos, Kor.2:15) Siday doonta ha ahaatee, waxay mararka qaar macnaheedu si fudud uga dhigan yahay “qayaxan” (Yooxaana 10:24,11:14,16:25,29)

Faaliimaha Rasuulada Bawlos waxaa uu uga hadlay fariinta ku saabsan Ciise,“dhiiranaan” si la mid ah sidii Ciise uga hadlay Aabbaha iyo qorshayaasha balan qaadkiisa (Faliimaha rasuulada 2:29;4:13;29;31;9:27-28;13:46; 14:3;18:26.19:8;26:26;28:31) Bawlos waxa kale oo uu waydiistay in loogu duceeyo sidii uu dhiiranaan ugu wacdin lahaa Injiilka. (Efiyaan 6:19; 1Tesoloniika 2:2) isla markaasna ugu noolaan lahaa Injiilka (Filibooy 1:20).

Bawlos waxa uu ka rajeeyay Ciise in uu siiyo dhiiranaan iyo kalsooni si uu Injiilka ugu wacdiyo qarnigan sharka leh. (2 Kor.3:1-12). Waxaa kale oo uu kalsooni ku qabay in xerta ay si quman u dhaqmi doonan (2 Kor. 7:4)

Weedhahan waxaa ku jira arrin qoto dheer. Cimraaniyada waxay midani samaynaysaa macne weyn oo ah dhiiranaanta uu Ciise kaga hadlay Ilaah iyo isagaba.(Cibraaniyada 3:6;4:16;10:19;35).Rumaystayaasha si buuxda ayaa loo aqbalay looguna soo dhaweyay in ay xidhiish dhaw la yeeshaan Aabbaha iyagoo midan ku helaya wiilka dartiis.

Dhawr si yaalood ayaa loogu addeegsaday Axdiga cusub.

1. Kalsooni,dhiiranaan ama dammaanadqaad waxay la xidhiidhaa
 - a. Dadka (Falimaha Rasuulada 2:29,4:13;31; 2Kor.3:12, Efesos 6:19)
 - b. Ilaah (1Yooxaana 2:28;3:21,4:12,5;14.;Cibraaniyada,3:6;4:16;10;19)
2. U hadlid si toos ah, cad ama aan gabad lahayn (Markos 8:32;Yooxaana 7:4; 13:10;24;11:14;16:25; Faliimaha Rasuulada28:31)
3. In uu ka hadlay fagaare dadwayne (Yooxaana 7:26;11:54;19:20)
4. Qaabkan la xidhiidha (*parrhēsiazomai*) ayaa la addeegsaday si loogu wacdiyo tiyoo xaalad qalafsani jirto (Falimaha Rasuulad 18:26; 19:8 Efesos 6: 20; 1 Tesoloniika 2:2) qoraalkani waxa uu tilmaamaya Kalsoonida soo noqosha labaad.

Rumaysta yaashu kama cabsi qabaana soo laabashada danbe ee Ciise. Waxaay ku sugayaan farxad iyo rayn ray waayo Ciise ayay ku dhex noolyiin iyagana isagaa ku dhex nool.

4:30 “intii aad gacantaada u soo fidinaysid si aad ugu bogsiisid” waa ereyo shabbahaad ah (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:33) loona adeegsaday sheegitaan Ilaah oo naxariistiisa iyo awooddiisa wax ku bogsiya. Calaamooyinku waxay ahaayeen arrin lagu ansixinayo runta ku jirta farriinta injiilka. Waxaana ay farriin aadu uga duwan u tahay wixii noloshooda oo dhan ay ku dhex maqli jireen sanagooyada.

4:31 “meeshay ku urursanaayeen baa gariirtay” arrintan markhaatiga laga yahay haddana Ilaah waxa uu ku taageeraya calaamad kale oo muuqata oo tusinaysa awooddiisa iyo joogitaankiisa, sidii uu sameeyay maalintii Bentakostiga oo kale. ereyganna waxa loo adeegsaday marka dabayshu babbanayso.

▣ **“oo dhammaantood waxaa ka wada buuxsamay Ruuxa Qoduska ah”** Fiiro u yeelo iyada markale haddana dhammaantood uu ka buuxsamay (cf. 2:4; 4:8,31; 9:17; 13:9,52, eeg fiirada 5:17). Ka buuxitaankani waxa uu wacdin dhiiranaani ku jirto u ahaa injiilka. Sidoo kalena u fiirso iyadoon la sheegin carrabada. Falimaha Rasuullada marka carrabada lagu sheegay, caadi ahaan waxay tusinayaan injiilka oo aanu jirin wax xadeeya isla markaana u ahaaday dhaqan kasta.

▣ **“hadalkii Ilaah”** kitaabka Jerome Biblical Commentary (p. 180) ayaa bixinaya fiiro fiican oo ku saabsan ereyadan, “Waa midda uu hadiyo jeer Luukos u jeclaa inuu ku sheegyo farriinta Masiixiyadda (eeg 6:2,7; 8:14;

11:1; 13:5,7,44,46,48; 16:32; 17:13; 18:11). Iyadoo si kale ahina waa “ereyga Rabbiga” (8:25; 13:49; 15:35,36; 19:10,20; 20:35) ama marka lasoo gaabsadao “ereyga/hadalka” (4:29; 6:4; 8:4; 10:44; 11:19; 14:25; 16:6).”

Middani haddaba waa su’aasha dhexda u ah rumaysadka, “Injiilka miyaa Axdiga Cusub dhexdiisa looga hadlay isagoo ah hadalka Ilaah?” Rumaysadku waxa uu tabar yeeshaa marka uu Ruuxu ku yidhaahdo “haa”!

▣ **“dhiiranaan ugu hadleen”** eeg Mawduuca Gaarka ah 4:29.

NASB (UPDATED) TEXT: 4:32-35

³²Oo intoodii badnayd oo rumaysatay isku qalbi iyo naf bay ahaayeen; midkoodna ma odhan, Waxaan leeyahay waa waxaygii, laakiin wax waluba waa ka dhexeeyeen. ³³Oo rasuulladu xoog weyn bay sarakicidda Rabbi Ciise uga marag fureen; oo nimco badan baa dhammaantood ku soo dul degtay. ³⁴Mid wax la'aana iyaga kuma jirin, waayo, in alla intii dhul ama guryo lahayd way iibiyeen, oo qiimihii wixii la iibiyey ayay keeneen, ³⁵oo rasuullada soo hor dhigeen; oo waxaa wax loo qaybshay mid kasta siduu wax ugu baahnaa.

4:32 “Oo intoodii badnayd oo rumaysatay isku qalbi iyo naf bay ahaayeen” ruuxda midaysntaana ee dhextaallay rumaystayaasha (1:14) waxa ay ka tarjumaysaa midaysnaanta Ilaah Saddexmidnimada ah (cf. Yooxanaa 17:11,21,23; Efesos. 4:4-6). Ereyadan oo kale waxa lagu adeegsaday Markos 12:30 iyadoo ka tarjumaysa amarka ugu horreeyay Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-5.

▣ **“wax waluba waa ka dhexeeyeen”** waxa ay dareemeen oo u dhaqmeen sida qoys oo kale. middanina waxa ay ahayd isku daygii ugu horreeyay ee kaniisaddu inay maal geliso adeegga. Waxa ay ahayd mutadawacnimo manay ahayn qasab. Waxa ay ahayd jacayl iyo is danayn, manay ahayn xukuumad ama heer mujtamac ujeedadoodu.

4:33 “sarakicidda Rabbi Ciise uga marag fureen” middani waxay ahayd xaqiiqada dhexda u ah farriintooda (I Korintos 15). Ciisena wuxuu ahaa mid nool!

▣ **“oo nimco badan baa dhammaantood ku soo dul degtay”** Warqadaha Bawlos waxaan ka baranaynaa in wakhti danbe kaniisaddani ay ahayd mid faqiira (cf. Rooma. 15:3; Galatiya. 2:10). Nimcada badani, sida nolosha badan (cf. Yooxanaa 10:10) waxyar uun bay ka tartaa waxyaalaha la taaban karo. Fiiro u yeelo badnaantan oo dhammaantood dhex taallay iyadoo ku koobnayn hoggaamiyayaasha, kuwa hadiyadaha gaarka ah bixiya, ama kuwa heer dhaqaale oo gaara leh.

4:34 Kaniisaddu waxay dareentay masuuliyadda midkasta ka kale ka saaran. Kuwii wax haystay waxay wax uugu deeqeen kuwii baahida qabay (aayadda 35). Tanina maaha hanta wadaag, balse waa jacayl shaqaynaya.

4:35 “oo rasuullada soo hor dhigeen” tani waa arrin dhaqan ahaaneed oo ah wax isasiin. Waxii manfaca lahaa ee ay haysteenna iyo lacagtiina waxay hordhigeen Rasuullada waayo nafahooda ayay hordhigeen Ciise.

▣ **“wax loo qaybshay”** waa fal mafcuulku soo horreeyo oon dhammays tirnayn, oo tusinaya fal soconaya wakhti tegay. Middani waxay raacaysaa tusaalaha sanagooga ee ah caawinta dadka baahan.

▣ **“mid kasta siduu wax ugu baahnaa”** waxa jirta faallo xiiso leh oo ay Klein, Blomberg, iyo Hubbard ku bixinayaan *Introduction to Biblical Interpretation*, pp. 451-453, waana iyadoo qoraalka Marx uu koobsanayo labo xigasho oo ka ahaaday Falimaha Rasuullada:

1. “ka ahaatay midkasta karaankiisa” – 11:29

2. “u ahaatay mid kasta baahidiisa”

Dhibaataada dabiqaanku waxay tahay haddaba iyadoo dadka casriga ahi ay Kitaabka u adeegsadaan waxaanu Kitaabku weligiis sheegin. Kitaabka macnihiisu ma noqon karo waxa aanu qoraagii asalka ahaa uugala jeedin ama dhegeystuhu. Qoraalka waxa aan dhaqamadeenna uugu dabaqi karnaa siyaabo kala duwan iyo xaalado kala duwan, laakiin dabiqaankeennu waa inuu ahaado mid la xidhiidha macnihii qoraaga asalka ahaa uugala jeeday. Qoraal kasta oo kitaabi ahina waxa uu leeyahay macne keliya, laakiinse leh muhiimado ama dabiqaanno badan. (ka eeg siminaarkayga ku saabsan fasiraadda Kitaaba. www.freebiblecommentary.org).

NASB (UPDATED) TEXT: 4:36-37

³⁶Markaasaa Yuusuf oo rasuulladu ugu yeedhi jireen Barnabas, kan lagu micneeyey Wiilkii gargaaridda, oo qoladiisu Laawi ahayd oo reer Qubrus u dhashay, ³⁷intuu beer uu lahaa iibshay ayuu lacagtii keenay oo soo hor dhigay rasuullada.

4:36 “Yuusuf oo qoladiisu Laawi ahayd” Axdiga Hore waxa uu wadaaddada ka xaaraantinimaynayaa inay dhul yeeshaan, laakiin xukuumaddii Roomaanka ayaa waxyaabo badan ka dhex bedeshay Falastiin.

▣ **“oo rasuulladu ugu yeedhi jireen Barnabas,(kan lagu micneeyey Wiilkii gargaaridda)”** kani waa macnaha caanka ah ee “Barnabas.” Xagga Aramaatiga waxa macneheedu noqon karaa “wiilkii waxsii sheegidda” ama Cibraaniga “wiilkii Nebo” (AB, vol. 1). Waxa uu hoggaamiye hore ka ahaa kaniisaddii Yerusaaalem sidoo kalena wuxuu ahaa Bawlos saaxiibkiis la socon jiray. Eusebius, oo ah taariikh yahan wakhtigii hore ah, ayaa waxa uu sheegayaa inuu ka mid ahaa toddobaatanka ku sugan Luukos 10.

MAWDUUC GAAR AH: BARNABAS

I. Ninkani

- A. wuxuu ku dhashay Qubrus (cf. Fal 4:36)
- B. wuxuu ahaa reer Laawi (cf. Fal 4:36)
- C. naanaystiiisu waxay ahayd “wiilka dhiirri gelinta” (cf. Fal 4:36; 11:23)
- D. wuxuu xubin ka ahaa kaniisaddii Yerusaaalem (cf. Fal 11:22)
- E. hadiyad ruuxi ahaaneed wuxuu u lahaa nebinimo iyo macallin (cf. Fal 13:1)
- F. waxa loogu yeedhay rasuul (cf. Fal 14:14)

II. Adeeggiisii

A. Yerusaaalem

1. wuxuu iibiyay hantidiisii oo dhan isagoo siiyay Rasuullada si loo siiyo kuwa baahan (cf. Fal 4:37)
2. wuxuu hoggaamiye ka ahaa kaniisaddii Yerusaaalem (cf. Fal 11:22)

B. Bawlos oo uu la socday

1. waxa uu ahaa kii ugu horreeyay ee aamina inuu Bawlos rumaysad yeeshay (cf. Fal 9:27).
2. Wuxuu u tegay Tarsus isagoo raadiyay Bawlos iskana kaashadeen kaniisadda cusub ee Antiokh (cf. Fal 11:24-26).
3. Kaniisadda Antiokh waxay Barnabas iyo Bawlos u dirtay kaniisadda Yerusaaalem iyagoo wax ugu deeqaya kuwa baahiyaysan (cf. Fal 11:29-30).
4. Barnabas iyo Bawlos oo u baxay socdaalkii adeegitaan ee ugu horreeyay (cf. Fal 13:1-3)
5. Waxa uu hoggaamiye ka ahaa Qubrus, laakiin waxa markii danbe la aqoonsaday hoggaaminta Bawlos (cf. Fal 13:13)
6. Waxay kaniisadda Yerusaaalem siiyeen warbixinta iyo sharraxaadda adeegga ay ka dhex wadaan kuwa aan ahayn Yuhuudda (cf. Fal 15, Guddigii Yerusaaalem).
7. Barnabas iyo Bawlos waxay markii u horreysay isku khilaafeen sharciyada cunata Yuhuudda iyo weheshiga kuwa aan Yuhuudda ahayn sida ku xusan Galatiya. 2:11-14.
8. Barnabas iyo Bawlos waxay qorsheeyeen socdaal adeegitaan oo labaad, laakiin wuxuu khilaaf kayimid Barnabas inaadeerkiis John Mark (Kolosay 4:10), oo ka hadhay socdaalkii hore (Fal 13:13). Bawlos ayaa haddaba diiday inuu socdaalkan u kaxaysto, sidaasi darteedna kooxdii way qaybsantay (cf. Fal 15:36-41). Middan natiijadeeduna waxay noqotay labo kooxood (Barnabas iyo John Mark iyo Bawlos io Silas).

III. Dhaqankii Kaniisadda (Eusebius)

- A. Barnabas waxa uu ka mid ahaa toddobaatankii Ciise diray (cf. Luukos 10:1-20).
- B. waxa uu shahiidnimo Masiixiyadeed uugu dhintay jasiiraddiisa Qubrus.
- C. Tertullian ayaa sheegaya inuu qoray kitaabka Cibraaniyada.
- D. Clement ga Alexandria isna wuxuu sheegayaa inuu qoray kitaabka aan la soo qaadnin ee Warqadda

4:37 “beer uu lahaa” waxa uu ahaa nin hanta leh (sida Nikodemos iyo Yuusuf kii Aramaatiya). Cutubka 5 ayaa waxa uu tusinayaa qaabka maal gelinta adeeggan (hisaasenimada, beensheegidda, iyo dhimashada).

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Waa ayo Sidukiintu? Maxay sidaa uugu wareersanaayeen?
2. Waa maxay Sanhadriinku?
3. Maxay tahay muhiimadda ku jirta Sabuurka 118?
4. Maxay aayadda 12 muhiim u tahay?
5. Qadarka aayadda 28 ma wuxuu sheegayaa dad gaara mise qorshaha Ilaah ee ku waajahan badbaadada? Waayo?
6. Luukos ma wuxuu isku dayayaa inuu dejiyo ku dayasho kaniisaddu ah sida ku sugan 4:32-5:11?

FALIMAHA RASUULLADA 5

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ananiyas iyo Safira	Been u sheegidda Ruuxa Quduuska	Wadaagidda Manfaca (4:32-5:11) 4:32-5:6	Ananiyas iyo Safira	Khiyaanadii Ananiyas iyo Safira
5:1-11	5:1-11	5:7-11	5:1-6 5:7-8 5:9-11	5:1-6 5:7-11
Calaamooyin iyo yaabab badan ayaa la sameeyay	Kaniisadda oo sii xoogaysanaysay	Xidhitaankii labaad ee Rasuullada	Mucjisooyin iyo yaabab	Xaaladdii guud ahaaneed
5:12-16	5:12-16	5:12-21a	5:12-16	5:12-16
Silcintii Rasuullada	Rasuulladii oo xabsigii lagasii daayay		Rasuulladii waa la silciyay	Xidhitaankii iyo sii dayntii Rasuullada
5:17-26	5:17-21		5:17-21a	5:17-18 5:19-21a Maxkamad soo taagis la hordhigay Sanhadriinka
	Rasuulladii oo markale maxkamad lasoo taagay	5:21b-26	5:21b-26	5:21b-26
	5:22-32	5:27-32	5:27-28	5:27-33
5:27-32	Taladii Gamalii'eel	Gamalii'eel	5:29-32	
5:33-42	5:33-42	5:33-39a	5:33-39a	Soo dhex galiddii Gamalii'eel
		5:39b-42	5:39b-42	5:34-39a 5:39b-41 5:42

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
3. Baaragaraafka labaad
4. Baaragaraafka saddexaad
5. IWM

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 5:1-6

¹laakiin nin Ananiyas la odhan jiray, isagoo haweenaydiisii Safira la jirto, ayuu xoolihiisii qaar iibshay, ²markaasuu qiimihii, haweenaydiisii oo la og, intuu qaar la hadhay, qaar keenay oo rasuulladii soo hor dhigay. ³laakiin Butros baa ku yidhi, Ananiyasow, maxaa Shayddaanku qalbigaaga u geliyey inaad Ruuxa Qoduuska ah been u sheegtid oo aad qiimihii dhulka qaar la hadhid? ⁴Markaad haysatay, miyaanay waxaagii ahayn? Oo markii la iibshay dabadeedna, miyaanad adigu u talin? Maxaad waxan qalbigaaga u gelisay? Dad been uma aad sheegin, waxaadse u sheegtay Ilaah. ⁵Markii Ananiyas hadalladaas maqlay ayaa, intuu dhulka ku dhacay, naftii ka dhacday; oo kuwii taas maqlay oo dhan cabsi weyn baa gashay. ⁶Markaasaa nimankii dhallinyarada ahaa, intay kaceen, isagay duudduubeen, markaasay qaadeen oo soo aaseen.

5:1 “Ananiyas” magaca Cibraaniga ahi waxa weeyi Hananiyah oo macnihiisu yahay “YHWH si naxariile ayuu u bixiyay” ama “YHWH wuu naxariistaa” (BDB 337).

▣ **“Safira”** Waxay ahayd Ananiyas naagtiisa. Magacuna xagga Aramaatiga wuxuu ka dhigan yahay “qurxoon.” Labadubana waxay ahaayeen rumaystayaal.

5:2 “intuu qaar la hadhay” falkan oo kale (*nosphizomai*) waxa lagu dhex adeegsaday Sabtuujantiga (LXX) Yashuua 7:1 iyadoo la sheegayo denbiga Caakaan. F. F. Bruce ayaa tafsiirkiisa Falimaha Rasuullada (NIC) waxa uu faallo ka bixiyay Ananiyas oo kaniisaddii ugu horreysay u ahaa sidii Caakaan oo kale. denbiganina waxa uu dhaawac ku yahay kaniisadda gebi ahaanba. Ereygan oo kale waxa lagu adeegsaday Tiitos 2:10 iyadoo loo adeegsaday addoomo sayidkooda wax ka xadaya.

▣ **“qaar keenay oo rasuulladii soo hor dhigay”** middan waxa kasoo horjeeda sida Barnabas ku yeelay 4:37. Labadan is qabay waxay xorriyad u lahaayeen inay iibiyaan ama aanay iibinin hantidooda shakhsi ahaaneed (aayadda 4). Waxa ay xorriyad u haysteen inay badh bixiyaan ama dhammaan wada siiyaan shaqada Rabbiga. Xaq uumay lahayn in ay badh bixiyaan oo sheegtaan inay waxoodii oo dhan bixiyeen. Ujeeddooyinkoodii iyo ficilladooda labo wejiilanimada ahayd waxay muujisay qalbiyadooda (cf. v. 4c; Luukos 21:14). Ilaah haddaba waxa uu daalacdaa qalbiyada (cf. I Samuu’eel. 16:7; I Boqorradii. 8:39; I Taariikhdii. 28:9; Maahmaahyadii. 21:2; Yeremyaah. 17:10; Luukos 16:15; Fal 1:24; Rooma. 8:27).

5:3 “Shaydaanku...Ruuxa Qoduuska ah” middani waxay tusinaysaa joogitaanka labadan awoodood ee ruuxiga ah iyagoo ka dhex shaqaynaya dunida iyo nolosheenna. Efesos 2:2-3 (Yacquub 4) ayaa lagu diiwaan geliyay saddexda cadaw ee aadanaha:

1. nidaamka dunida leexatay
2. jarribaha shakhsi ahaaneed

MAWDUUC GAAR AH: SHAYDAAN

Kani waa mawduuc sababo dhowra dartood u adayg badan

1. Axdiga Hore muujin maayo wanaag oo keliya, laakiin waxa uu tusinayaa adeegaha YHWH, kaasi oo aadanaha wax ugu deeqaya isla markaana ku eedeynaya xaqnimo la'aan. Waxa jira Ilaah keliya (tawxiid), awood keliya, iyo mid keliya oo Axdiga Hore dhexdiisa wax keena – YHWH.
2. Arrinta shakhsi ahaaneed ee la xidhiidha dhinaca wanaagsan ee Ilaah waxa lagu horu mariyay suugaan ay saamayn ku yeelatay diimihii Aasiyaanka (*Zoroastrianism*). Middani waxa ay si wayn u saamaysay diintii Yuhuudda ee rabbaaniyiinta iyo bulshadii Esseyiinta (Qoraallada Badda Dhimatay).
3. Axdiga Cusubi waxa uu horumarinayaa fikiro ka muuqanaya Axdiga Hore isla markaana siyaabo kala duwan loo doortay. Haddii qof isku dayo inuu daraasad ku sameeyo fiqiga kitaabiga ah la xidhiidha sharka (qoraa kastaa si gaara ayuu uga hadlay), waxa la arkayaa aragtiyo kala duwan oo sharka ah isla markaana la muujiyay.

Haddii si kastaba ha ahaatee diraasaynta sharka la xidhiidha een kitaabiga ahayn, sida ta diimaha dunida, markaa waxa la arkayaa iyada oo ay ku hadhaysantahay waxyaalaha lamaanaha ah ee laga aaminsanaa dunida Aasiya iyo Giriigga iyo Roomaanka.

Haddii qof uu yahay mid u go'san Qorniinka oo ah ilaahi, markaa waa in Axdiga Cusub loo arko muujin Horumar ku jirta. Masiixiyiintu waa inay iska ilaaliyaan ogolaanshaha kutidhi ku teenta Yuhuudda ama waxyaalaha suugaanta reer galbeedku sheegayso (Dante, Milton) inay arrinta ku yeeshaan saamayn dheeraad ah. waxa jirta hubaal in dhinacani muujinteedu qarsoontahay. Ilaah waxa uu doortay in aanu muujinin dhinac kasta oo la xidhiidha sharka, asalkiisa iyo sida uu ku soo horumaray iyo ujeedadiisu waxa ay tahay, laakiin waxa uu muujiyay in laga adkaaday.

Axdiga Hore dhexdiisa ereyga “shaydaan” ama “eedeeye” (BDB 966) waxa uu la xidhiidhi karaa saddeex kooxood.

1. dacweeyayaasha aadanaha (cf. I Samuu'eel. 29:4; II Samuu'eel. 19:22; I Boqorradii. 11:14,20,29; Sabuurka. 109:6)
2. dacweeyayaasha malaa'igaha (cf. Tirintii. 22:22-23; Ayuub 1-2; Sekeryaah. 3:1)
3. dacweeyayaasha jinka (cf. I Taariikhdi. 21:1; I Boqorradii. 22:21; Sekeryaah. 13:2)

Meesha keliya ee lagu sheegay abeesada Bilowgii 3 ayaa Shaydaanka lagu tiriyay (cf. *Book of Wisdom* 2.23-24; *II Enoch* 31:3), oo xitaa middani waxa ay noqotay ta ay doorteen rabbaaniyiintu (cf. *Sot* 9b iyo *Sanh.* 29a). “wiilasha Ilaah” ee Bilowgii 6 waxa ay noqdeen malaa'ig sida ku sugan *I Enoch* 54:6. Middan waxa aan u sheegay aniga oon tilmaamayn sida fiqi ahaan ay usoo aroortay, laakiin waa tusinta sidii ay kusoo horumartay. Axdiga Cusub dhexdiisa waxyaalahaan Axdiga Hore waxa lagu tilmaamay wax la xidhiidha malaa'ig, kuwaasoo lagu sheegay shar (cf. II Korintos. 11:3; Muujintii. 12:9).

Asal ahaan sida sharka shakhsi ahaan loo tilmaamay way adagtay ama suurto gal maaha (waxay ku tiirsantahay sidaad u aragto) in Axdiga Hore laga qeexo. Mid ka mida sababuhuna waa Israa'iil 7:14; Ishachaayh. 45:7; Caamoos 3:6). Wax kasta oo sababana waxa lala xidhiidhiyay YHWH si loo sheego gaarnimadiisa iyo awooddiisa (cf. Ishacyaah. 43:11; 44:6,8,24; 45:5-6,14,18,21,22).

Ilo laga heli karo warbixin ayaa ah (1) Ayuub 1-2, halkaasoo Shaydaan uu kaga mid yahay “wiilasha Ilaah” (malaa'igo) ama (2) Ishacyaah 14 iyo Yexesqeel 28, halkaasoo u dhow boqorradii faanka badnaa ee bariga (Baabiloon iyo Turos) iyadoo lagu misaalay faanka iyo kibirka Shaydaanka (1 Timoteyos 3:6). Waxa aan isku dhex daray caadifado ku saabsan dhinacan. Yexesqeel waxa uu adeegsanaya Beer Ceeden tusaale ah, iyadoon ahayn boqor Turos oo Shaydaan lagu misaalay (cf. Yexesqeel. 28:12-16), laakiin sidoo kalena boqorka Masar ayaa lagu misaalay Geedka Garashada Wanaagga iyo Sharka (Yexesqeel 31). Si kastaba ha ahaatee, Ishacyaah 14 gaar ahaan aayadaha 12-14, waxay u muuqdaan inay sheegayaan malaa'igta oo kibir ku sameeyay Kacdoon. Haddii Ilaah uu rabay inuu inoo muujiyo dabeecadda gaarka ah

iyo asalka Shaydaanka sidan ayaa ah midda uugu haboon. Waa in aan ka digtoonaano in aan adeegsano fiqi ku dhisan qaybo, hadallo gaagaaban, qoraayaal, kitaabo iyo noocyo iyaga lala xidhiidhinayo qaybo ka mida arrin ilaahi ah.

Waxa ku waafaqsanahay Alfred Edersheim (*The Life and Times of Jesus the Messiah*, vol. 2, lifaaqa XIII [pp. 748-763] iyo XVI [pp.770-776]) in rabbaaniyiintii diinta Yuhuuddu ay badanaa saamayn ka heleen lamaanenimadii Aasiyaank iyo waxyaalah la xidhiidha jinka. Rabbaaniyiinu maaha meel wanaagsan oo loogu noqon karo xaqiiqada arrintan. Ciisena aad buu ugasoo horjeeday waxbarista sinagoogyada ee dhinac la xidhiidha. Waxaan u malaynayaa fikirka la xidhiidha cadowga Ilaah ee YHWH inuu kasoo unkamay labadii ilaah ee sare ee Iraniyaanka *Ahkiman* iyo *Ormaza*, iyadoo kaddibna rabbaaniyuuntu ka dhigeen arrin kitaabi ah oo la xidhiidha YHWH iyo Shaydaan.

Waxa jirta muujin Horumar ah oo ku sugan Axdiga Cusub dhexdiisa oo la xidhiidha shakhsiyaynta sharka, laakiin maaha mid la mida sida u haysteen rabbaaniyiintu. Tusaale wanaagsan oo ah farqiga arrintan u dhexeeya waa “dagaalka samada.” Soo dhacitaanka Shaydaanku waa arrin macquul ah, laakiin sida ay ku dhacday lama sheegin. Xitaa taa la bixiyayna daahbaa ku dedan waana nooca suugaanta apocalyptiga (cf. Muujintii. 12:4,7,12-13). Inkasta oo Shaydaanka la jebiyay oo lagaga adkaaday Ciise dhulkana loo musaafuriyay, ilaa hadda waxa uu u adeegayaal YHWH (cf. Matayos. 4:1; Luukos 22:31-32; I Korintos. 5:5; I Timoteyos. 1:20).

Waa in aan ka taxaddarno waxyaalaha la xidhiidha arrintan oo aan isku salayno. Waxa jirta awood shakhsi ahaaneed oo ah jarriibaad iyo shar, laakiin waxa jira oo keliya hal Ilaah inaguna waxa aan marwalba masuul ka nahay doorashadeenna. Waxa jirta goob dagaal oo ruuxi ah, taasi oo ah ka hor iyo kadib badbaadada. Guushuna waxa ay ku iman kartaa oo ku sugnaan kartaa Ilaaha Saddexmidnimada isku muujiyay. Shaydaankana waa laga takhalusay oo laga adkaaday!

MAWDUUC GAAR AH: SHARKA SHAKHSI AHAANEED

Kani waa mawduuc adag siyaabo dhowra aawadood:

1. Axdiga Hore muu muujinin cadaw kasoo horjeeda wanaagga, laakiin wuxuu muujiyay adeegaha YHWH oo aadanaha ku xidhiidhinaya kuna eedaynaya xaqnimo la'aan.
2. Fikradda ah cadawnimada Ilaah uu leeyahay waxay ka timid saamaynta diintii Aasiyaanka (*Zoroastrianism*), waxaanay saamayn ku yeelatay Yuhuudda.
3. Axdiga Cusubi wuxuu si dhammaystiran u sii horu marinayaa aragtida Axdiga Hore, laakiinse wuxuu ku salaynayaa dabaqado kalasoocon.

Si kastaba ha ahaatee, daraasaynta amaba barashada sharka qayb ka mida oon ahayn Kitaabka, ayaa waxay yihiin kuwo laga ay ka hadlaan diimaha bariga, kadibna Axdiga Cusub waxa calaamad ka dhex noqday, waxyaalaha ay aaminsanaayeen Aasiyaanka iyo Roomaanku.

Haddii markaas qof rumaysadkiisu uu yahay mid ku salaysan waxyiga ku sugan Qoraallada Quduuska ah, Axdiga Cusubi wuxuu noqonayaa dhammaystirka waxyiga. Masiixiyiinu waa inay iska ilaaliyaan waxyaalaha dhaqan ahaan Yuhuuddu aaminsan yihiin iyo waxyaalaha kale ee ay sheegayaan qoraallada reer galbeedku (Dante, Milton) marka la qeexayo waxa Kitaabku arrinta ka qabo. Waxaa haddaba jirta in xagga waxyiga marka la eego arrintani ay tahay mid qarsoon. Ilaah muu dooranin inuu wada muujiyo dhammaanba dhinacyada khuseeya sharka asalkiisa, ujeedadiisa, laakiinse waxa uu muujiyay waxyeelladiisa.

Axdiga Hore dhexdiisa erayada la xidhiidha Shaydaanka ama eedeeyayaasha waxa loo kala saaraa saddex kala duwan:

1. Eedeeyayaasha aadanaha (1 Samuu'eel 29:4; 2 Samuu'eel 19:22; 1 Boqorradii 11:14,23,25; Sabuurka 109:6).
2. Eedeeyayaasha malaa'igaha (Tirintii 22:22-23; Sekaryaah 3:1)
3. Eedeeyayaasha jinniga (1 Taariikhiihii 21:1; 1 Boqorradii 22:21; Yexesqeel 13:2)

Haddaba, kitaabka Bilowgii 3 ayaa ah meesha lagu tilmaamay Shaydaanka (Book of Wisdom 2:23-24; 2 Enoch 31:3), manay intaas kaddib jirin waxay rabbaaniyiintu ka samayn karaan arrintan (*Sot* 9b iyo *Sanh* 29a). “wiilasha Ilaah” ee Bilowgii 6 ayaa malaa’igo ku noqday I Enoch 54:6. Haddaba, arrintan uumaan tilmaamin, inaan ka hadlo saxsanaanteeda fiqi ahaaneed, laakiin waxa weeyi si aan u muujiyo heerarkii ay soo martay. Axdiga Hore dhexdiisa waxyaalahaan ka shaqaynayay ayaa haddaba Axdiga Cusubi waxa uu ku sheegay malaa’ig sharlayaal ah (Shaydaan) sida aan ka heli karno 2 Korintos 11:3; Muujintii 12:9.

Haddaba, asalka sharka la magacaabay waxa adag amaba aan caqli gal ahayn, in lagu dhex qeexo Axdiga Hore. Sabab ka mida arrintan ayaa waxay ahayd Israa’iiliyiinta (1 Boqorradii 22:20-22; Wacdiyaha 7:14; Ishacyaah 45:7; Caamoos 3:6). Waxwalbana waxa lala xidhiidhin jira oo lagu Ilaah oo waxwalba maamula (Ishacyaah 43:11; 44:6,8,24; 45:5-6, 14, 18, 21, 22).

Ilaaha macluumaadka suurto galka ahina waxay diiradda saarayaan (1) Ayuub 1-2 halkaasoo shaydaanku uu yahay mid ka mida “wiilasha Ilaah” (malaa’igaha) ama (2) Ishacyaah 14; Yexesqeel 28 halkaasoo meel ku dhow boqortaayada bari tusaale ahaan loogu adeegsan jiray faanka Shaydkaanka (1Timoteyos 3:6). Waxaan haddaba fikiro isku dhex jira ka haystaa arrintan. Yexesqeel waxa uu tusaale ahaan u adeegsanayaa Beer Ceeden mana aha boqor Turos oo Shaydaanka keli ahaan lagu tilmaamayo (Yexesqeel 28:12-16), laakiinse waxa sidoo kale loo adeegsaday boqorka Masar oo lagasoo qaaday sida Geedka Garashada Xumaanta yo Wanaagga (Yexesqeel 31). Si kastba ha ahaatee Ishacyaah 14, gaar ahaan aayadaha 12-14, waxay u muuqdaan iyaga oo tilmaamaya malag caasinnimo sameeyay isagoo isla wayn. Haddaba, haddii uu rabo inuu inoo muujiyo dabeecadda gaarka ah ee Shaydaanka, waxay tahani middani arrin aad u maldahan.

Kitaabka uu qoray Alfred Edersheim (*The Life an Times of Jesus Messiah*, vol. 2, XIII [pp. 748-763] iyo XVI [pp. 770-776]) ayaa waxay leeyihiin rabbaaniyiinta Yuhuudda ahayd waxa saamayn ku yeeshay waxyaalihii Aasiyaanku aaminsanayeen. Haddaba, rabbaaniyiintu maaha ilo xaqiiqo oo arrintan loogu noqon karo. Ciise Masiixna waxa uu wuxuu ahaa mid kasoo jeeday waxbaristii ay ku samayn jireen Sinagooga. Waxaan filayaa fikiri rabbaaniyiintu ka haysteen dhexdhexaadinta malaa’igta iyo kasoo horjeedsashada Sharciga Muuse lagu siiyay Buur Siinay dusheedu, inuu furay fikirka ah cadowga malaa’igta ah ee Ilaah iyo kan aadanaha. Labadii ilaah ee uugu sarreeyay ilaahyada Iraaniyiinta (Zoroastrian) labonimada, *Ahkiman* iyo *Ormaza*, khayrka iyo sharka, ayaa saamayn ku yeeshay Yuhuudda kana dhigay inay sameeyaan labonimo xaddidan oo ah Yahweh iyho Shaydaanka.

Hubaashii Axdiga Cusub ayaa wuxuu isna ka waramayaa sharka, laakiin maaha sidii ay rabbaaniyiintu ka amaaninsanaayeen si lamid ah. tusaalaha ugu wanaagsan ee loo soo qaadan karo farqiga u dhexeeyaana waa “dagaal samada dhexdeeda ah.” dhicista Shaydaankuna waa caqligal, laakiin sigaara looma sheegin. Xitaa waxyaalaha laga sheegay waa kuwo dedan (Muujintii 12:4,7,12-23). Inkasta oo haddaba Shaydaanka laga adkaaday oo loo soo mustaafuriyay dhulka, ilaa hadda wuxuu u hawl gala isagoo ah adeegaha Yahweh (Matayos 4:1; Luukos 22:31-32; 1 Korintos 5:5; 1 Timoteyos 1:20).

Waa inaan haddaba xad u yeelno u fiirsashadeenna ku aaddan mawduucan. Waxa jirta jarribaad shaqsi ahaaneed iyo mid sharka xaggiisa ah, laakiinse marwalba waxa jira hal Ilaah oo aadanahuna iyaga ayaa ah kuwa ka masuulka ah waxa ay dooranayaan. Waxa jira loollan xagga ruuxa ah ka hor badbaadada iyo dabadeedba, sidaasi darteedna guushu waxay ku iman kartaa kuna sugnaan kartaa marka la raaco Ilaah isku muujiyay Saddexmidnimada. Sharkana waa laga adkaaday waxanu noqon doonaa mid meesha laga saaro!

▣ **“geliyey”** tani waxa ay la mid tahay ereyga loo adeegsaday Ruuxa (Efesos 5:18). Gelinta ama ka buuxintu waxa ay u baahantahay iskaashi! Waxa inaga buuxa wax (eeg fiirada 5:17)! Shaydaankuna wuu ku jiraa, laakiinse inaga ayaa masuul ka ah (cf. Luukos 22:3-6). Waxa aan soo jeedinayaa in akhrin dheeraada laga sameeyo kitaabka *Three Crucial Questions About Spiritual Warfare*, oo uu leeyahay Clinton E. Arnold. Si layaableh wuxuu uuga hadlayaa shaydaanku saamaynta uu ku leeyahay nolosha rumaystayaasha (cf. Efesos. 6:10-19; I Yooxanaa 5:18-19). Eeg fiirada 2:4 iyo 3:10. Weedhani (qalbigaaga u geliyay) waxa laga yaabaa in ay tahay hadal duur xula oo Cibraani ah (cf. Esteer 7:5; Wacdiyihii. 8:11; 9:3). Culimmo badan ayaana cutubyada u horreeya ee Falimaha Rasuullada waxay u arkaan asalkoodu inuu yahay Aramaati.

▣ **“inaad Ruuxa Qoduuska ah been u sheegtid”** waxa ay been u sheegeen Butros iyo kaniisadda, laakiin run ahaantii waxay been u sheegeen Ruuxa. Fiqi ahaan waxay la mid tahay Ciise oo la hadlayay Bawlos markuu ku socday Dimishiq kuna yidhi “Maxaad ii silcinaysaa?” (Fal 9:4). Bawlos waxa uu silcinaya rumaystayaasha, laakiin Ciise waxa uu ka dhigtay shakhsi ahaan, sida Ruuxuba halkan ku samaynayo. Tani waa in ay digniin u noqoto rumaystayaasha casriga ah.

5:4 aayaddani waxay koobsanaysaa labo su'aalood oo filaya jawaabo ah "haa." Waa qaab naxwe ahaaneed oo mana aha arrin amar ah.

▣ **"Dad been uma aad sheegin, waxaadse u sheegtay Ilaah"** may ahayn oo keliya lacagta oo ay haysteen, laakiin been ayay sheegeen iyagoo isu ekaysiinayaa kuwo ruuxu kujiro. Fiiro u yeelo xitaa iyada oo arrin fiican oo ujeeddo xun loogala jeedaa ay tahay denbi (Rooma 14:23c). Fiiro u yeelo iyadoo Ruuxa Quduuska ah ee lagu dhexsheegay aayadda 3 loogu yeedhay Ilaah.

5:5 "intuu dhulka ku dhacay, naftii ka dhacday" dunidii hore neefta ugu danbaysa ee qofku waxay caddayn u ahayd in ruuxdu ay qofkaas ka baxday (cf. Xaakinnadii. 4:2; Yexesqeel. 21:7 sida ku sugan LXX ka). Ereygan dhifka ah waxa Axdiga Cusub dhexdiisa laga helayaa Falimaha Rasuullada oo keliya (cf. 5:4,10; 12:23). Waxaanay calaamad u tahay xukunka ama ciqaabista. Waxa ay la mid tahay xukunkii Ilaah ku fuliyay wiilashii Haaruun sida ku sugan Laawiyiintii 10. Ilaah denbiga waa uu necebyahay, waxaanu sababaa nafta oo la waayo (cf. II Boqorradii. 14:6; Yexesqeel. 18:4,20).

▣ **"kuwii taas maqlay oo dhan cabsi weyn baa gashay"** waxa suurto gala in tani ay ahayd ujeeddada xukunkani u dhacay. Waxa ay la mid tahay dhimashooyinkii Axdiga Hore ee Nadaab iyo Abihu ee ku sugan Laawiyiintii 10 iyo Cusaah ga ku sugan 2 Samu'uul 6. Iyadoo ku salaysan I Korintos. 11:30; Yacquub 5:20; iyo I Yooxanaa 5:16-17, waxa suurto gal ah in denbiyada qaarkood oo rumaystayaashu sameeyaani ay keento dhimasho soo degdegta. Waxa adag isu dheelli tirista quduusnaanta Ilaah iyo Aabbenimada Ilaah.

5:6 "oo soo aaseen" Yuhuuddii qarnigii ugu horreeyay may samayn jirin in maydka laga ilaaliyo inuu hore u baaba' o (ilaa hadda ma sameeyaan), sababtuna waa Bilowgii 3:19 (cf. Sabuurka. 103:14; 104:29). Qofka waa in si dhakhso ah loo aaso, hadiyo jeerna maalin gudiheed ayaa lagu aasi jiray.

Iyadoo taasi ahayd wax aan la samaynin aawadeed ayaa waxa aan jirin adeeg xasuus ahaaneed ama waxyaalo la xidhiidha aasitaanka Masiixiyiintii.

MAWDUUC GAAR AH: QAABABKII AASKA

I. Mesabotaamiya

- A. Xabaal gaar ah ayaa loogu baahnaa farxadda nolosha kaddib.
- B. Tusaale ku saabsan inkaarta reer Mesabotaamiya waa, "dhulku jidhkaaga ma haleelo."

II. Axdigii Hore

- A. Xabaal gaar ah aad ayey muhiim u ahayd (cf. Wacdiyaha 6:3).
- B. Si dhaqo leh ayaa loo samayn jiray (cf. Sarah-da ku jirta Bilowgii 23 iyo Raaxeel-sha ku jirta Bilowgii 35:19 oo ogsoonow Sharciga Ku Noqoshadiisa 21:23).
- C. Xabaal aan caadi ahayn waxa ay ahayd calaamad diidmo iyo dembi.
 - 1. Sharciga Ku Noqoshadiisa 28:26
 - 2. Ishacyaah 14:20
 - 3. Yeremyaah 8:2; 22:19
- D. Haddii ay macquul tahay waxaa xabaasha laga dhex samayn jiray booska qoyska dhexdiisa.
- E. Ma jirin waxa eedayn ah, sidii Masar oo kale. Aadanuhu boodh ayuu ka yimid waana in uu boodh u laabtaa (tusaale ahaan. Bilowgii 3:19; sabuurrada 103:14' 104:29).
- F. Xagga Yuhuuddii sharciga way adkayd in la qiyaasto maammuus gaar ah iyo in maydka loo sameeyo aas ku habboon.

III. Axdiga Cusub

- A. Xabaasha oo horay si dhaso leh loo diyaariyo, sida badan afar iyo labaatan saacadood. Badanaa Yuhuuddu saddex maalmood ayey qabriga daawan jireen, iyagoo rumaysan in naftu ay jidhka ku soo noqon lahayd isla waqtigaas (cf. Yooxanaa 11:39).
- B. Aaska oo uu la socdo in maydka la nadiifiyo oo lagu duudduubo maryo dhir udug leh la mariyey (Yooxanaa 11:44; 19:39-40).
- C. Ma jirin xeerar ama qodobbo u gooni ahaa aaska Yuhuudda iyo Masiixiyiinta ama sheyo xabaasha lala gelinayo qarnigii koowaad ee falastiin..

NASB (UPDATED) TEXT: 5:7-11

⁷Abbaaraha saddex saacadood dabadeed ayaa haweenaydiisii soo gashay iyadoo aan ogayn wixii dhacay. ⁸Markaasaa Butros u jawaabay oo ku yidhi, Inaad dhulkii intaas ku iibiseen iyo in kale, ii kala sheeg. Markaasay tidhi, Haah, intaasaannu ku iibinnay. ⁹laakiin Butros baa ku yidhi, Sidee baad ugu heshiiseen inaad Ruuxa Rabbiga jirrabtaan? Bal eeg, kuwii ninkaaga soo aasay cagahoodii albaabka agtiisay ka soo sanqadhayaane. Adigana waw ku qaadi doonaan. ¹⁰Markiiba intay ku hor dhacday isaga, ayaa naftii ka dhacday; markaasaa nimankii dhallinyarada ahaa soo galeen, oo waxay arkeen iyadoo meyd ah. markaasay intay qaadeen ku aaseen ninkeedii agtiisa. ¹¹Markaasaa cabsi weyni gashay kiniisaddii iyo kuwii waxyaalahaas maqlay oo dhan.

5:7 “Abbaaraha saddex saacadood” Tani waxa ay tusinaysaa caddaynta diiwaan gelinta waxyaabaha laga ahaa markhaatiga goob joogga ah. Luukos qoraalkiisa waxa uu ku salaynayaa faahfaahin, waxaanay ka tarjumaysaa qaabka qoraalkiisa iyo baadhitaaka (waraysiga markhaatiyaasha goob joogga ahaa).

5:8 beenta oo ah falka sii soconaya!

5:9 “jirrabtaan” marka la eego macnaha, middani waxay ahayd tijaabinta joogitaanka awoodda Ruuxa Quduuska ah, inuu Ilaaha Aabbaha ahi ahi joogo dhulka guudkiisa (eeg Mawduuca Gaarka ah 1:2). Waxa jira cidhib ku meel gaadha iyo mid weligeed ah oo ku imanaysa la loollanka Ruuxa! Labadan qof haddaba may aqoonsanayn in ay been u sheegayaan Ruuxa, laakiin waxa tusiyay Butros.

Waxa jira labo erey oo Giriigga loogu adeegsaday tijaabada. Middanina waxa ay tusinaysaa “tijaabinta ku waajahan baabi’iin.” Waxa suurto gala inay sheegayso Baxniintii 17:2 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 6:16, halkaasoo ay ka digayaan tijaabinta YHWH (cf. Sabuurka. 78:18,41,56).

MAWDUUC GAAR AH: ERAYADA GIRIIGGA EE “TIJAABINTA”

Waxa jira labo eray oo Giriik ah isla markaasna loo adeegsado tijaabinta qof ujeeddo laga leeyahay

1. *Dokimazō, dokimion, dokimasia*

Waxa loo adeegsadaa qofka sida ay maskaxdiisu tahay. haddaba nidaamka jidh ahaaneed ee tijaabinta ayaa noqday mid awood leh oo ay adeegsadaan Ilaah iyo aadanuhuba, waxaanay ku tijaabiyaan kuwa kale. Waxa markaas loo adeegsaday eraygan aragtida ku waajahan aqbalitaanka waxaas:

- a. dibi, Luukos 14:19
- b. innaga nafehenna, 1 Korintos 11:28
- c. rumaysadkeenna, Yacquub 1:3
- d. xitaa Ilaah, Cibraaniyada 3:9

Natijoooyinka kasoo baxa tijaabooyinkan ayaa waxay u muuqdeen kuwo sax ah (Rooma 1:28; 14:22; 16:10; 2 Korintos 10:18; 13:3; Filiboy 2:27; 1 Butros 1:7). Haddaba, fikraddani waxay gudbinaysaa in qof la itixaamo oo kaddibna la ogaado.

- a. fiicnaanta
- b. wanaagga
- c. caqli badan
- d. qiimo leh
- e. faa’ido leh

2. *peirazō, peirasmos*

Waxa weeyi in qof la itixaamo iyadoo la aqbalayo amaba la diidayo. Waxaana loo adeegsaday iyadoo lala xidhiidhinayo Ciise aqbalitaankiisa amaba diidmadiisa.

- a. Waxay gudbinaysaa jarribaadda Ciise (Matayos 4:1; 16:1; 19:3; 22:18,35; Markos 1:13; Luukos 4:2; 10:25; Cibraaniyada 2:18).
- b. Eraygan (*peirazō*) waxa loo adeegsaday magac ahaan Shaydaanka sida aan ka arki karno Matayos 4:3;

1 Tesaloniika 3:5.

- c. Waxay ka kooban tahay lakab (*ekpeirazo*) waxaana loo adeegsaday Ciise oon jarribin Ilaah (Matayos 14:7; Luukos 4:12; sidoo kale eeg 1 Korintos 10:9). Waxa loo adeegsaday jarribaadaha Masiixiyiinta dhexdooda (1 Korintos 7:5; 10:9, 13; Galatiya 6:1; 1 Tesaloniika 3:5; Cibraaniyada 2:18; Yacquub 1:2,13,14; 1 Butros 4:12; 2 Butros 2:9). Ilaah waxa uu ogolyahay saddexda cadow ee aadanaha (dunida, jidhka, iyo sharka) si uu u muujiyo wakhti iyo meel gaar ah.

5:10 ereyga loo adeegsaday sheegitaanka “nimankii dhallin yarada ahaa” (*neoterōi*) ee aayadda 6 waxa uu ka gedisan yahay *neanikoi* ee aayadda 10. Waxa aan la hubin in kala duwanaanshahani uu ku salaysan yahay koox kaniisadda ka tirsan iyo kuwo kale. labada erey ee Giriigga ahina waxay ka yimaaddeen isku asal (*neos*).

5:11 “cabsi weyni gashay...kuwii waxyaalahaas maqlay oo dhan” Luukos waxa uu adeegsanayaa ereyga guud ee *phobos* marar badan u adeegsanayaa macne isku mid ah (cf. Luukos 1:69; 3:37; Fal 19:17). Rumaystayaasha waxay u tahay tixgelin iyo wacad, laakiin kuwa aan rumaysadka lahayn, waxay u tahay xaaraantinimayn, cabsi iyo argagax (cf. Luukos 12:4-5; Cibraaniyada. 10:31).

☐ “kaniisad” tani waa markii ugu horreysay ee lagu dhex adeegsado Falimaha Rasuullada, inkasta oo ay ku sugantahay Textus Receptus 2:47. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: KANIISAD (*EKKLESIA*)

Erayga Giriigga ah ee *ekklesia* wuxuu ka yimid labo eray, “banaan” iyo “yeedhay,” haddaba, macno ahaan waxa weeyi kuwa loo yeedhay. Kaniisaddii hore waxay eraygan kasoo qaateen adeegsi caadi ah (Falimaha Rasuullada 19:32,39,41). Maadaama oo adeegsiga Septuagint ee eraygani ahaa “uruuritaan” xagga Israa’iiliyiinta (Tirintii 16:3; 20:4). Waxay u adeegsadeen sidii iyaga oo sii wada dadkii Axdiga Hore ee Ilaah. waxay ahaayeen Israa’iisha cusub (Rooma 2:28-29; Galatiya 6:16; 1 Butros 2:5,9; Muujintii 1:6), ahna dhammays tirka ujeeddada Ilaah ee ku waajahan dunida (Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5-6; Matayos 28:18-20; Luukos 24:47; Falimaha Rasuullada 1:8).

Eraygan siyaabo kala duwan ayaa marar badan loogu dhex adeegsaday Injiillada iyo Falimaha Rasuullada

1. Kulan caadi ah, Falimaha Rasuullada 19:32,39,41
2. Dadka Masiixiyiinta ah ee Ilaah, Matayos 16:18 iyo Efesos
3. Kulanka Masiixiyiinta, Matayos 18:17; Falimaha Rasuullada 5:11 (kaniisadda Yerusaaalem sida aayadahan ka muuqata)
4. Isu imaatinka dadkii Israa’iil, Falimaha Rasuullada 7:38, Istifaaniyoos.
5. Dadka Ilaah ee ku sugan gobol, Falimaha Rasuullada 8:3 (Yuhuudiya amaba Falastiin).

NASB (UPDATED) TEXT: 5:12-16

¹²Rasuulladii waxay gacmahooda dadka dhexdiisa ku sameeyeen calaamooyin iyo yaabab badan; iyagoo isku wada qalbi ah ayay waxay wada joogeen Balbaladii Sulaymaan. ¹³ laakiin kuwii kale midkoodna kuma dhicin inuu iyaga ku darmado, hase ahaatee dadkii waa sharfeen iyaga; ¹⁴oo waxaa ku soo kordhay iyaga kuwa badan oo Rabbiga rumaystay, oo rag iyo dumarba leh; ¹⁵xataa waxay noqotay inay kuwii bukay jidadka u soo saareen oo ku jiifiyeen sariiro iyo dermooyin si hooskiisu u dul maro qaarkood. markii Butros uu soo maro. ¹⁶Oo waxaa kaloo ku soo ururay dad badan oo ka yimid magaalooyinkii Yerusaaalem ku wareegsanaa, iyagoo wada dad buka iyo kuwo jinniyo wasakh lahu derdereen; oo kulligood waa la wada bogsiiyey.

5:12-16 waa soo koobitaan gaaban oo uu caan ku yahay kitaabka Falimaha Rasuulladu (cf. 2:43-47 iyo 4:32-35).

5:12 “calaamooyin iyo yaabab badan” waa fal aan dhammays tirnayn oo mafcuulku soo horreeyo. Labadan erey waxay ka muuqanayaan xigashada Butros ee Yoo’eel 2 oo ku sugan Fal 2:19. Mucjisooyinku waxay ahaayeen kuwo soo noqnoqda (cf. 2:43; 4:30; 5:12; 6:8; 7:36; 14:3; 15:20). Xusuusnow iyada oo mucjiso lahaantu aanay markasta calaamad u ahayn ilaahnimada (cf. Matayos. 24:24; iyo II Tesaloniika. 2:9), laakiinse waxay ahayd jid ansixinaya farriinta Masiixiyadda, taasi oo ka gaar ahayd waxyaalaha ay diiradda saaraysay diinta Yuhuuddu.

▣ **“waxay wada joogeen”** eeg fiirada 1:14. Luukos waxa uu muhiimadda siinayaa inuu middan kusoo celceliyo. Waxa ay ahayd fikrad nooc aan in badan sii jirin!

▣ **“Balbaladii Sulaymaan”** waxa ay ahayd meel furan oo ku taalla Macbadka xagga giraarka bari ee maxkamadda Kuwa aan ahayn Yuhuudda. Ciise ayaa halkaas badanaa waxbaris ku sameeyay (Yooxanaa 10:23). Waxa ay ahayd dhismihii markii u horreysay lagu xidhay Butros iyo Yooxanaa.

5:13

NASB

“kuwii kale midkoodna kuma dhicin inuu iyaga ku darmado”

NKJV, NRSV

“kuwii hadhay midna kuma dhicin inuu ku darsamo”

TEV

“cid kooxda ka baxsani kuma dhicin inay ku darsanto”

NJB

“cidina kuma dhicin inay iyaga ku darsanto”

Tani waa weedh aan caadi ahayn. waxay u muuqataa inay sheegeyso dhinaca diidmada ah ee “cabsida.” Waxa jira kooxo dhowra oo macnaha siyaabo kala duwan u sheegay (aayadaha 12-16). Siday u badantahay dhacdooyinkuna waxay keenayeen rumaysashada Masiixa (cf. #5 iyo suuro gal #6 iyo #7) ama xoojinta rumaysashada Masiixa (i.e., #3).

1. Rasuullada, aayadda. 12
2. Dadka, aayadaha. 12,13
3. Rumaystayaasha (i.e., oo wada jooga Balbaladii Sulaymaan), aayadda. 12
4. kuwii kale (i.e., hoggaankii Yuhuudda), aayadda. 13
5. Rumaystayaal cusub, aayadda. 14
6. Kuwii xanuunsanaa ee Yeruusaalem, aayadda. 15
7. kuwii xanuunsanaa ee agagaarka ka dhowaa, aayadda. 16

Falka wakhti xaadirka jooga ee “ku biiris” waa “ku darsamid.” Luukos badanaa wuu adeegsanayaa, laakiin macnayaal ballaadhan oo kala duwan ayuu u adeegsanayaa.

Halkan waxa ay ku sheegeysaa iyaga oon ka mid noqon kooxda cusub (kuwii Ciise u rumaystay inuu yahay Masiixa).

5:14 “rumaystay” waa fal u shaqaynaya sidii wax tegay oo soconaya, oo ka tarjumaya fal soconaya. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:40 iyo 3:16

▣

NASB, TEV,

“rumaystay Rabbiga”

NJB, NIV

“u rumaystay Rabbiga”

NKJV, NRSV

Qaabkan naxwe ahaaneed waxa loo fahmi karaa mafcuul aan toos ahayn (u ahaaday) ama meeleeeye. Waxa aan u malaynayaa in ay tahay jid loo toosinayo in rumaystayaashaasi ay u ahaadeen Rabbiga. Isaga ayaa ina leh oo isaga ayaynu u ahaannay!

▣ **“dumarba”** Dumar si gaara wuxuu ugu sheegayaa “dumar” Injiilka iyo Falimaha Rasuullada labadaba (i.e., 1:14; 8:12; 16:1,13; 17:4,12,34; 18:2; 21:5). Ciise waxa uu keenayaa macne cusub oo sharfitaan ah loona samaynayo haweenka iyo carruurta.

▣ **“ku soo kordhay iyaga”** Luukos waxa uu badanaa samaynayaa hadallo uu kusoo koobayo koritaanka kaniisadda (cf. 2:47; 5:14; 6:7; 9:31; 12:24; 16:5; 19:20).

5:15 “markii Butros uu soo maro si hooskiisu u dul maro qaarkood” Mucjisooyinku markan waxay ahaayeen kuwo markasta dhaca iyaga oo ansixinaya injiilka. Butros waxa uu ahaa afhayeenka Rasuullada. Ansixinta sidan oo kale ahina, caafimaadin waxay ku timid Bawlos (19:12).

Haddii aan nahay mufasiriin waa inaan xasuusano in calaamooyinkan mucjisooyinka loo bixiyay si

1. loo muujiyo naxariista Ilaah.
2. loo tusiyo runta ku jirta injiilka.
3. loo tusiyo kuwa Ilaah ugu yeedhay inay hoggaamiyayaal noqdaan.

Calaamooyinkan waxa lagu bixiyay dhaqan gaar ah, muhiimad gaara darteed. Maadaama oo Ilaah uu halkaas ku sameeyay, macneheedu markasta maaha inuu samaynayo wakhti kasta oo taariikhda ah isagoo ku samaynaya dhaqan kasta. Maaha macneheeda in Ilaahaasi aanu casri kasta shaqaynayn ama naxariistiisu yaraanayso, laakiin waa in dadka Ilaah ay ku socdaan rumaysad oonay ku soconin aragti! Mucjisooyinku waa joogto, laakiin badbaadada denbiilayaashu waa inay noqoto ujeedada ugu muhiimsan, mana aha muhiimaddu bogsiinta jidh ahaaneed ee kuwo markastaba dhimanaya!

Waxay aniga iila muuqataa in Ilaah aanu is beddelin. Dabeecaddiisa, awooddiisa, naxariistiisa iyo doonistiisa ah in cid kastaa badbaaddo weli waa sidii ismanay beddelin, laakiin marka fahan ahaan la eego taariikhda, waxa jiro labo wakhti oo xoogganaan leh, calaamooyin aan caadi ahayn, labadubana waxay ka imanayaan Ilaah iyo Shaydaan

1. ku hareeraysaan wakhtigii jidh soo qaadashada iyo horumarkii kaniisaddii ugu horreysay
2. ka horreeya dhammaadka wakhtiga marka rumaystayaasha si khariban loo silcin doono.

Waxa aan jeclahay inaan wax kasoo xigto A. T. Robertson, *Word Pictures in the New Testament*, vol. III, p. 62

“Dabcan may jirin dabeecad heer sare ah ama awood ku sugnayd hadhka Butros. Waxa uu ahaa rumaysad xooggan oo la mida xaalado ku sugan Injiillada (Matayos. 9:20; Markos 6:56; Yooxanaa 9:5) iyo adeegsiga maryihii Bawlos (Fal 19:12). Ilaah xitaa waxa uu sharfaa rumaysadka xoogganaantiisa haddii uu yahay rumaysad dhaba oo isaga laga qabo. Dad yar ayaana gebi ahaanba rumaysadkaas.”

5:16 “oo kulligood waa la wada bogsiyey.” Waa fal mafcuulku soo horreeyo oon dhammays tirnayn, waxaanu sheegayaa in mid kasta la bogsiyay (adeegaha lama sheegin, laakiin waa Ruuxa) mar keliya mid mar, ilaa cidina aanay soo hadhin!

Kani waa hadal noociisu yahay koobitaan. Markaa ma macno ahaanteed aya u qaadanaa (mid kasta)? Ciise waxa uu dalbaday rumaysad ama bogsiinta wuxuu u adeegsaday (1) tabobarista xerta ama (2) inuu dadka dareenkooda kusoo jeediyo si ay u dhegeystaan.

Waxa la yaab leh iyada oo dhammaanba kuwa lagu bogsiyay Axdiga Cusub dhexdiisu aanay wada “badbaadin” (isku hallaynta Masiixiyadda iyo helitaanka nololsha weligeed ah). bogsiinta jidh ahaaneed waxa ay beddel taag daran u tahay badbaadada ruuxiga ah. mucjisooyinkuna waxay waxtar leeyihiin marka ay inoo keenayaan oo keliya Ilaah. Aadanaha oo dhamina waxay ku noolyihiin duni leexatay oo waxyaalaha xumina way dhacaan. Ilaah badanaa waxa uu doortaa inaanu fara gelinin, laakiin tani waxba kama odhanayso jacaylkiisa iyo danayntiisa. Waxa aad ka taxadirtaa in Ilaah uu mucjisooyin ku shaqeyo casrigan sharka miidhan ah. Isagu waxa uu leeyahay awoodda oo dhan inaguna garan mayno sida ay tahay xaalad kasta oo la ina siiyay.

Meeshan iyada ah waxaan ku jeclaan lahaa inaan kusoo daro waxyaalo loo fiirsan karo oo ku sugan tafsiirkayga II Timoteyos 4:20 oo ku saaban bogsiintii jidh ahaaneed ee Bawlos (eeg www.freebiblecommentary.org) :

“Waxa jira su’aalo badan oo aan jecelnahay inaan waydiinno qorayaasha Axdiga Cusub. Mawduuc keliya oo rumaystayaasha oo dhammi ka fikiraan aya ah bogsiinta jidh ahaaneed. Falimaha Rasuullada (cf. 19:12; 28:7-9) Bawlos waxa uu ku awoodayay inuu wax bogsiyo, laakiin halkan iyo II Korintos. 12:7-10 iyo Filiboy. 2:25-30, wuxuu u muuqdaa inaanu awoodi karin. Maxay sababta qaar uun loo bogsiyay oon dhammaan loo bogsiinin, mise waxa jirtay wakhti ay furnayd daaqadda bogsiintu oo la xidhay?

Waxa aan hubaa oon rumaysanahay awoodda sare iyo Aabbaha naxariista badan ee sameeyay bogsiinta jidh ahaaneed iyo midda ruuxi ahaanee, laakiin maxaa arrinta bogsiinta la xidhiidhaa ay u tahay mid joogta iyadoo sidoo kalena maqan? Uma malaynayo in ay la xidhiidho rumaysadka aadanaha, Bawlosna hubaashii wuu lahaa rumaysad (II Korintos 12). Waxaan rumaysanahay bogsiintaas iyo mucjisooyinka la sheegay in ay yihiin kuwo runa oo ku sugan injiilka isla markaasna ka shaqaynaysa meelihii ugu horreeyay ee dunida lagu wacdiyay. Si kastaba ha ahaatee, waxa aan dareemayaa in Ilaah uu inaga rabo inaan ku socono rumaysad ooynaan ku soconin aragti ama calaamad. Sidoo kale, bogsiinta xanuunada jidh ahaaneed waa mid badanaa looga dhex ogolyahay nololsha rumaystayaasha (1) iyadoo ah ciqaab ku meel gaadha oo la xidhiidha denbiga;

(2) iyadoo ah cidhibta nolosha dunidan leexatay dhexdeeda; iyo (3) in rumaystayaash alaga caawiyo sidii ay qaan gaadh xagga ruuxa uga noqon lahaayeen. Dhibkaygu waxa weeyi anigoon ogayn ka lagu guda jiro! Waxaan Ilaah ka baryayaa in xaalad kastaa ay u dhacdo iyada oon keenaynrumaysad yaraan, laakiinse ay tahay Ilaah oo naxariistiisa aawadeed isugu dayaya inuu doonistiisa kaga dhex shaqeeyo nolol kasta.”

▣ “jinniyo wasakh lahu” eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: JINIQABE (RUUX AAN DAAHIR AHAYN)

- A. dadyowgii hore waxay ahaayeen qaar aan Ilaah aqoon. Waxay u nisbayn jireen dabeecdaha shakhsi ahaaneed in ay saameeyaan xooga dabeecada, xayawaanka, iyo walxaha dabiiciga ah. Nolosha waxaa loo nibayn jiray waxyaala haasi la falgalaan binu aadmiga.
- B. Muqaalka noocan ah ayaa waxa uu keenay caabudaada (Ilaahyo badan) abdiyaa jinni qabe (*genii*) waxay ahaayeen ilaahyo yar yar ama ilaah-shaydaano (shar iyo wanaagba) saamayn kule nolosha aadanaha
1. Qalalaasahii iyo dagaaladii, Mosabotaaniya
 2. Nidaamkii iyo kala danbytii, Masar
 3. Kancaan, eeg W. F. Albright’s *Archaeology and the Religion of Israel*, Daabacaadda Shanaad, pp. 67-92
- C. Axdiga hore wax saasi ah kama si sheego mawduuca ilaahyo yar ayar, malaaiig, jinni, sabatuna inay ahayd ku adkaansha uu ku adagyahay in la caabudi hal Ilaah kaliya. (Baxniintii8:10;9:14;15:11; Sharciga Kunoqoshadiisa 4:35,39;6:4;33:26; Sabuurada35:10;71:19;86:6; Ishacyac 46:9 Yeremiya 10:6-7; Mikah 7:18) ma ay sheegin ilaah beeneedyadii ay caabudi jireen ummadahii Cawaanka ahaa (Shedim, Sharciga kunoqoshadiisa 32:17; Sabuurada 106:37 wuxuun bay magacoday qaar ka mid ah iyaga
1. Seim (dhogor ama shaydaan gas leh, Laawiyiintii 17:17 II Korintiyas 11:15)
 2. Lilith (dhedig, shaydaan dareen soo jiidasho leh Ishacyac 34-14)
 3. Mavet (erey Cibraani ah oo loo adeegsaday dhimashadii ilaahii reer kancaan ee dunida hoosteeda, Mot Ishacyaac 28:15;18; Yeremiya 9:21; iyo suurogal ahaan Sharciga kunoqoshadiisa 28:22)
 4. Resheph (halaag Sharciga ku noqoshadiisa 33:29; Sabuurada 78:48; Xabaquq 3:5)
 5. Dever (dilaa ah, Sabuurada 91:5-6; Xabaquq 3:5)
 6. Az’azel (magic aan l hubin, balse noqon kara shaydaankii lama degaanka ama meel magaceed, Laawiyiintii 16:8,10,26).
- Tusaale yaashan waxaa laga soo qaatay Encylopaedia Judaic, vol. 5, p, 1523)
- Siday doontaba ha ahaatee ma jiraan wax awoodao shaydaan ama malaaiigeed oo ka sareeya YHWH Axdiga hore dhexdiisa. (Ayub 1-3; Sakariya 3) ma aha mid si madaxbanaan ama, cadow iskiis isu hagaya (A.B. Davidson waxbaristiisa diimeed eek u saabsan Axdiaga hore,pp.300-306)
- D. Juudaismku waxay soo ifbaxday xiligii Baabuloon loo kaxaystay (586-538 ee C.H) waxay ahayd wax barsi Caqiido diineed oo ay samayn ku yeesheen Beershiyuunta Ilaah beeneedyo ama shaydaan caabdud ku salaysan, ilaah sare oo la odhan jiray Mazda ama ormasd oo ay ishayaan shaydaan isna la odhan jiray Ahriman.
- Tan ayaa gayaysiisay Juudaismkii ka danbeeyay kaxaysadkii Baabuloon in isku qasaan YHWH iyo malaaiigahiisa, iyo shaydaanka ama malaaiigtiisa ama shaydaanka. Barashada caqiidada Juudaism sawirka laga bixiyay Sharka waxaa si fiican u qeexay kuna qoray Alfred Edersheim buugiisii uu gu magic daray Noloshii iyo wakhtigii Ciise Masiix, tirsiisa 2 qaybtiisa XIII (pp.749-863) iyo XVI (pp.7700-776) seddexdan qaab ayay Juudaism u dhigtaa sharka
1. Shaydaan ama Sammael
 2. Ujeedka sharka ah (*yetzer hara*) ee dadka dhexdiisa
 3. Dhimashada Malaga
- Edersheim waxaa uu tanu u dhigay (1) eedeeyaha (2) Jirabaha (3) ciqaabaha (vol 2,P. 756). Waxaa u dhexeeyaa farqi muuqda habka uu sharka uga hadlo Juudaismkii ka danbeeyay xiligii kaxaysadka iyo sida uu u dhigo Axdiga Cusubi

E. Axdiga Cusub, khaastan Injiilada ayaa waxay sheegayaan jiritaanka shaydaanka iyo inuu markasta kazoo horjeedo ruux ahaan dadka iyo YHWH (Juudaisimka marka la eego Shaydaanku waxa uu yahay cadowga dadka balse Ilaah maaha) waxay ka horyaamdeen doonista ilaah iyo xukunkiisa boqortooyada .

Ciise oo si toosa ay isaga horyimaadeen, oo eray shaydaankaas, waaa uu ugu yeedhay(1) Ruuxa wasakhda ah (Lukos 4:36;6:18) ama (2) (Ruuxa sharka leh Lukos 7:21;8:2) ee ka yimaada dadka. Ciise si cad ayuu u kala saaray farqiga u dhexeeya bukaanada (jidhka iyo maskaxda iyo jinni qabida) waxaa uu muujiyay awoodiisa ruux ahaaneed isagoo aqoonsaday oo saaray ruuxayada sharka leh. Badiyaa way garan jireen isaga, waxayna isku dayijireen inay u qudbadeeyaan, laakiin Ciise waa diidi jiraymarkhaati furkooda, waanu aamusiinjiray oo saari jiray. Jinni saaristu waa calaamado muujinaya in laga guulaysaty boqortooyada shaydaanka.

Marka la eego haddaba waraaqaha Rasuuladaee Axdiga Cusub, waxa jirta arrib yaab leh oo ah sida aan looga warhayn arrinta mawduucan. Shaydaan saarista waligeed looma diiwaan galin sidii hadiyad ruuxi ah, ama waxbaris diimeed, ama hannaan, la looga faaiidayn karo shaqad wacdineed rumaystayaahsa faca iman doona musaqbalka

F. Shayrku waa mid run ahaan jira; sharku waa mid shakhsi ah, sharku waa mid wakhti xaadirkan jooga. Asalkeedii iyo qorshaheeda toona la muujinkitaabku wuxuu si xoogla u sheegaa jiritaankeeda kana soo horjeeda saamintiisa. Run ahaan ma jirto awood uu shaydaanku leeyay talada kama danbaysta. Ilaah ayaa xukunka gacanta ku haya. Shaydaanka waa laga guulaysan doonaa waana la xukumi doonaa lagana qaadi doonaa abuurka

G. Dadka ilaah waa inay iska caawiyaan sharka (Yacquub 4:7) isagu ma xukumi karo (1Yooxaana 5:18) laakiin wuu jirabi karaa oo wax yeelayn karaa maragfuryadooda (Efasos 6:10-18). Sharka waxaa lagu shaaciyay qayb ka mid aragtida dunida Masiixiynta ah. Masixiyiinta casrigani xaq uma laha inay dib u qaabeeyaan qeexida shaydaanka. (wax baristii ku saabsanyd shaydaan ka saarista ee Rudolf batman) qofnimo ka qaadida sharka qaab dhismeedkii bulsho ee Paul Tillich) amaba isku dayo lagu sharaxayo erayo nafsani ah (Sigmund Freud) saamayntiisa iyo boorintiisa ,balse laga adkaaday. Rumaysteyaasha waxaa laga rabaa in ay ku socdaan guusha Ciise soo hooyay.

MAWDUUC GAAR AH: JINISAARID

Jinni saaristu waxay ahayd caan maalimihii Ciise, laakiinse nidaamkii Ciise waxa uu ahaa mid aad gaar u ah. Sidii uu jiniga u saari jiray waxa ay calaamad u ahayd Casriga Cusub. Rabbaaniyiintu waxay adeegsan jireen qaababka sixirka (eeg Alfred Edersheim, *the Life and Times of Jesus, The Messiah*, vol. 2, Lifaaqa XIII, pp. 748-763; XVI, pp. 770-776), laakiin Ciise waxa uu adeegsaday awoodiisa ugaarka ah. Maanta waxa jira wareer badan iyo warbixin xun oo ku saabsan jinni saarista iyo jinniga. Dhibkan qayb ka mid ahi waxa weeyi Axdiga Cusub oon ka hadlin waxyaalaha arrintan la xidhiidha. Haddii aan ahay wadaad waxa aan jeclaan lahaa in aan hayn lahaa warbixin badan oo ku saabsan arrintan. Halkan waxa ah kitaabo arrintan ku saabsan oo aan ku kalsoonahay.

1. *Christian Counseling and the Occult*, Kurt E. Koch
2. *Demons in the World Today*, Merrill F. Unger
2. *Biblical Demonology*, Merrill F. Unger
3. *Principalities and Powers*, John Warwick Montgomery
4. *Christ and the Powers*, Hendrik Berkhof
5. *Three Crucial Questions About Spiritual Warfare*, Clinton Anton
6. Waxa iga yaabiya iyada oo jinisaarista aan lugu tirinin mid ka mida hadiyadaha ruuxiga ah iyo iyadoo aan lagaga hadlin warqadaha Rasuullada.

Waxa aan rumaysanahay aragtida kitaabiga ah ee dunida oo koobsanaysa ruuxi ahaan shar iyo khayr, kana dhex shaqaynaya dunidan (i.e., Ayuub 1-2; Daanyeel 10; Efesos. 6:10-18). Si kastaba ha ahaatee, Ilaah waxa uu doortay in aanu muujinin waxyaalo gaara. Haddii aan nahay rumaystayaalna waxa aan haysanaa dhammaanba warbixinta aan u baahanahay waxaan u baahi qabnaa inaan ku noolaano cibaado. Laakiin waxa jira mawduucyo aan la muujinin ama la horumarinin.

NASB (UPDATED) TEXT5:17-26

¹⁷laakiin waxaa kacay wadaadkii sare iyo kuwii la socday oo dhan, kuwaas oo ka mid ahaa dariiqada Sadukiinta; markaasay iyagoo aad u xanaaqsan, ¹⁸intay rasuulladii qabqabteen, xabsi ku rideen. ¹⁹laakiin malaa'igtii Rabbiga ayaa habeennimo albaabbadii xabsiga ka furtay, oo intay dibadda u soo saartay. ku tidhi, ²⁰Taga oo macbudka isdhex taaga, oo waxaad dadka kula hadashaan erayada oo dhan ee Noloshan. ²¹Markay taas maqleen ayay, intay aroortii macbudkii galeen, dadkii wax bareen. Laakiin wadaadkii sare iyo kuwii la jiray ayaa yimid, oo waxay isugu yeedheen shirkii iyo duqowdii reer bini Israa'iil oo dhan, markaasay cid u direen xabsigii in kuwii xidhnaa laga keeno. ²²laakiin saraakiishu markay xabsiga yimaadeen waa ka waayeen iyagii; markaasay shirkii ku noqdeen oo u warrameen, ²³oo waxay ku yidhaahdeen, Waxaannu aragnay xabsigii oo aad u xidhan, oo nimankii ilaalinayayna albaabbada ka taagan yihiin; laakiin markaannu furnay, ninna waa ka waynay. ²⁴Haddaba markii sirkaalkii macbudka iyo wadaaddadii sare hadalladaas maqleen, waxay la fajaceen waxyaalahaasu waxay noqon doonaan ²⁵Mid baa intuu u yimid ku yidhi, Ogaada, nimankii aad xabsiga ku riddeen, macbudkay dhex taagan yihiin, oo dadkay wax ku barayaane. **26** Markaasaa sirkaalkii, isagoo saraakiil kale la socoto, intuu tegey, rabshadla'aan u soo kaxeeyey; waayo, waxay ka baqeen dadku inuu dhagxiyo.

5:17 “iyagoo aad u xanaaqsan” Ereygan Giriigga marka uu yahay macnihiisu waa “xanaaqitaan.” Macnaha ama ujeedada markaas waxa aan ka arkaynaa iyadoo ah hinaaso. Waxa ay middani tusinaysaa ujeedada runta ahayd ee hoggaamiyaasha diinta. Luukos Injiilka uu qorayna waxa aan ka arki karnaa iyada oo cadaawayaashii Ciise ee ugu muhiimsanaa ay ahaayeen Farristiinta, laakiin Falimaha Rasuullada waxa aan ku arkaynaa in ay yihiin Sidukiinta.

Falka ah “ka buuxsamay” waxa uu Luukos u adeegsaday siyaabo kala duwan isaga oo cid sifaynaya.

1. Yooxanaa Baabtiisuha, xitaa dhalashadiisii ka hor waxa ka buuxay Ruuxa Quduuska ah— Luukos 1:15
2. Elizabeth waxa ka buuxsamay Ruuxa Quduuska— Luukos 1:41
3. Sakariye waxa ka buuxsamay Ruuxa Quduuska—Luukos 1:61
4. sinagooga kuwii joogay oo dhan markay Ciise maqleen cadho ayaa kabuuxsantay— Luukos 4:28
5. kuwii curyaanka saqafka sare kasoo riday waxa ka buuxsantay cabsi— Luukos 5:26
6. Farrisiintii iyo Culimadii Ciise la socday Sabtida waxa ka buuxsantay cadho— Luukos 6:11
7. kuwoo ku jiray qollada sare maalintii Bentakostiga waxa ka buuxsamay Ruuxa Quduuska— Fal 2:4
8. kuwii maqlay Butros oo ka dhex hadlayay macbadka waxa ka buuxsamay yaab— Fal 3:10
9. Butros oo Sanhadriinka hortooda ku hadlayay waxa ka buuxsamay Ruuxa Quduuska— Acts 4:8
10. all in the upper room were filled with the Holy Spirit — Fal 4:31
11. Shaydaanka oo ka buuxsamay qalbiyada Ananias iyo Safira — Fal 5:3
12. Butros iyo Yooxanaa markii ay la hadleen Sanhadriinka waxa ka buuxsamay hinaase— Fal 5:17
13. Yerusaaalem oo injiilku ka buuxsamay— Fal 5:28
14. toddobadii uu ka buuxay Ruuxa iyo xikamaddu— Fal 6:3
15. Istifanos waxa ka buuxsamay rumaysad iyo Ruuxa Quduuska— Fal 6:5,8; 7:55
16. Ananias waxa uu gacmaha dul saaray Bawlos waxaana ka buuxsamay Ruuxa Quduuska— Fal 9:17
17. Bawlos isagoo wacdinaya waxa ka buuxsamay Ruuxa— Fal 13:9
18. Yuhuuddii badnayd ee Bawlos wacdiyay waxa ka buuxsamay hinaase— Fal 13:45
19. xerta waxa si joogto ah uuga buuxsamay Ruuxa Quduuska— Fal 13:52
20. Efesos waxa ka buuxsamay wareer— Fal 19:29

Joogitaanka ruuxa adiga maxaa haddaba kaa “buuxa”?

5:18 cutubyadan ugu horreeya ee Falimaha Rasuulladu waxay tusinayaan dhibaatooyinkii soo waajahay kaniisaddii ugu horreysay. Dhibaatooyinku waxay ku kala duwan yihiin casri kasta iyo dhaqan kasta, laakiin Ilaah ayaa inala jira oo ina siinayo awood aan ku guulaysano. Wax kasta ha ahaato xabsi, silcin, cadaadin iyo hanjabaadina rumaystayaasha kama kaxayn karaan nabadda Masiixa (cf. Rooma. 8:31-39).

5:19 “malaa'igtii Rabbiga” ereyadan labo siyaabood ayaa loogu dhex adeegsaday Axdiga Hore.

1. malag (cf. Bilowgii. 24:7,40; Baxniintii. 23:20-23; 32:34; Tirintii. 22:22; Xaakinnadii. 5:23; I Samuu'eel. 24:16; I Taariikhdii. 21:15ff; Sekeryaah. 1:28)
2. qaab loo sheego YHWH (cf. Bilowgii. 16:7-13; 22:11-15; 31:11,13; 48:15-16; Baxniintii. 3:2,4; 13:21; 14:19; Xaakinnadii. 2:1; 6:22-24; 13:3-23; Sekeryaah. 3:1-2)

Luukos ereyadan badanaa wuu adeegsanayaa (cf. Luukos 1:11,13; 2:9; Fal 5:19; 7:30; 8:26; 12:7,11,23; 10:3; 27:23), laakiin macnaha #1 kor ku xusan. Axdiga Cusubi adeegsan maayo macnaha #2, marka laga reebo Fal 8:26 iyo 29, halkaasoo loo adeegsaday “malagii Rabbiga” iyadoo lala barbar dhigay Ruuxa Quduuska.

▣ **“albaabbadii xabsiga ka furtay”** tani waxa ay la mid tahay Bawlos iyo Siilas khibraddii Filibos (Fal 16:26). Siyaabo badan ayaa nolosha Butros waxa ay uula mid ahayd Bawlos. Waxaana laga yaabaa in middani ay tahay ujeedada uu Luukos uga jeedo.

5:20 “taga, isdhex taaga macbadka oo waxaad dadka kula hadashaan” middani waxay ku shaqaynasaa saddex amar.

1. Taga, ficil amar ah oo wakhti xaadirkaas ah
 2. Istaaga, fal mafcuulku soo horreeyo loona adeegsaday amar ahaan (Friberg's, *Analytical Greek New Testament*, p. 379)
 3. ku Hadashaan, fal wakhti xaadirka jooga oo amar ah.
- Malaggu waxa uu kaniisaddii hore u hayay adeeg wacdin ah (iyo kaniisadda maanta).

▣ **“dadka kula hadashaan”** tani waxay ahayd muhiimadda Rasuullada adeegooda. Dhiirranaan (eeg Mawduuca Gaarka ah 4:29), aan cabsiyi ku jirin ayaa ruuxooda ka buuxsamay uu caan ku ahaa.

▣

NASB **“erayada oo dhan ee Noloshan”**
NKJV **“ereyada dhan ee noloshan”**
NRSV **“farriinta dhan ee ku saabsan noloshan”**
TEV **“waxkastoo ku saabsan noloshan cusub”**
NJB **“dhammaan waxa ku saabsan noloshan cusub”**

Weedhani waxya ka hadlaysaa nolosha cusub (*zoe*, nolosha weligeeda) ee laga heli karo injiilka Ciise Masiix oo kelya. Iyaga waxa loo xoreeyay ruux ahaan (badbaadada) iyo jidh ahaan (xabsigoo laga saaray). Haddana waa in ay dhammaan wax kasta u sheegaan (cf. Matayos. 28:18-20; Luukos 24:47; Fal 1:8)

5:21 Fiiro u yeelo iyadoo awood aan caadi ahayn xabsiga lagaga sii daayay, hadana taas macneheedu maaha in mar labaad aan la xidhi doonin. Xitaa shaqada Ilaah macneheedu maaha in dhibaatooyinka oo dhan la xalliyo ama laga saaro adeegga (cf. Matayos. 5:10-12; Rooma. 8:17; I Butros. 4:12-16).

▣ **“shirkii iyo duqowdii reer bini Israa'iil oo dhan”** eeg Mawduuca Gaarka ah: Sanhadriin 4:5. Yaa loogala jeedaa “duqayda”? Curtis Vaughan *Acts*, pp. 39-40, waxa uu ku sheegayaa inay ahaayeen duqaydii Yerusalaam een xubanaha ka ahayn Sanhadriinka wakhti xaadirkaas (cf. M. R. Vincent, *Word Studies*, Vol. 1, p. 234), laakiin tarjumaadaha NASB iyo NIV waxay qabaan in duqaytida iyo Sanhadriiku isku mid ahaayeen.

5:23 “xidhan” waa fal dhammays tiran. Fikradduna waxa weeyi iyadoo albaabada xabsigu ammaan yihiin ilaaladuna joogto, laakiin Maxaabiistii way tegeen.

5:24 “waxay la fajaceen” Luukos ereyadan marar badan ayuu adeegsanayaa. Waa qaabka *aporeo* (cf. Luukos 24:4; Fal 25:20) ay la socoto *dia* (cf. Luukos 9:7; Fal 2:12; 5:24; 10:17). Macnaheeda asalka ahi waa shakhi ama hubaal la'aan.

▣ **“waxyaalahaasu waxay noqon doonaan”** qaabka naxwe ahaaneed ee weedhani waa midaan dhammays tirnayn waana jumlad shuruudeed heerka afraad ah (*an* oo uu la socdo falka dhaca waxa uu noqon doono). Waxa

weeyi fajicitaan ama ka yaabid (cf. Luukos 1:61-62; 3:15; 8:9; 15:26; 22:23; Fal 5:24; 8:31; 10:17; 21:33, eeg James Allen Hewett, *New Testament Greek*, p. 195).

5:26 “waxay ka baqeen dadku inuu dhagxiyo.” Tani waxa ay tusinaysaa sida ay caanka u noqotay kaniisaddii ugu horreysay (cf. aayadaha. 13; 2:47; 4:21) iyo hinaasihii hoggaamiyayaasha Yuhuudda oo sii socda.

NASB (UPDATED) TEXT5:27-32

²⁷Markaasay, intay soo kaxeeyeen, shirka soo hor taageen. Kolkaasaa wadaadkii sare weydiiyey, ²⁸oo yidhi, Waxaannu aad idiinku amarnay inaydnaan magacan wax ku barin; laakiin bal eega, waxaad Yerusaaalem ka buuxiseen waxbariddiinnii, oo weliba waxaad damacsan tihiin inaad ninkan dhiiggiisii dusha naga saartaan. ²⁹laakiin Butros iyo rasuulladii ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Waa inaannu Ilaah addeecno intaannu dad addeeci lahayn ³⁰Ilaahii awowayaashayo ayaa soo sara kiciyey Ciisihii aad geedka ku deldesheen oo disheen ³¹Ilaah baa isaga gacantiisa midigeed sare ugu qaaday inuu ahaado Amiir iyo Badbaadiye si uu Israa'iil toobad iyo dembidhaaf u siiyo. ³²Waxyaalahaas annagaa ka marag ah, waxaa kaloonka ka marag ah Ruuxa Qoduuska ah oo Ilaah siiyey kuwa addeeca

5:28

NASB, NRSV,

TEV “aad idiinku amarnay”

NKJV “aad idinku amraynaa”

NJB “aad idiinka digaynaa”

NKJV waxa uu dhigayaa “miyaanaan aad idinku amrin inaydaan magaciisa wax ku barin,” kaasi oo ah qoraal gacmeedka Giriigga ee a², D, iyo E, laakiin ma dhigayaan MSS P⁷⁴, a*, A, ama B. UBS⁴ ku waxa uu dooranayaa NKJV ga qoraalkiisa, laakiin “aanaan” ayuu gelinayaa qaws. Su’aashu waxay filaysaa jawaab ah “haa.” Rasuulladuna waxay ahaayeen kuwo digniin la siiyay!

Qaab dhismeedku waa duur xul semetig ah (Luukos 22:15) waxaanu la mid yahay mafcuulka luqada Koine Giriigga, halkaasoo falka (*parangelō*) iyo mafcuulka tooska ah (*parangelia*) waxay ka yimaaddeen isku meel. Qaab dhismeedkanina waxa uu tusinayaa macnaha asalka ah ee ereyadan. waxa xiiso leh iyoada oo ereygan laga helayo qoraalka Koine ga ee laga helay Masar iyadoo tusinaysa xukun ama digniin gaara oo kasoo baxday maxkamad (cf. Moulton iyo Milligan, *Vocabulary of the Greek New Testament*, p. 481).

▣ **“ninkan”** waxa uu hadalkani sheegayaa xaqiraadda hoggaamiyayaasha Yuhuudda. Weligood sheegi maayaan magaca Ciise. Xitaa Talmuudku waxa uu ugu yeedhayaa “sidaa iyo sidaa” (cf. M. R. Vincent, *Word Studies*, vol. 1, p. 234).

▣ **“dhiiggiisii dusha naga saartaan”** Butros iyo Yooxanaa waxa ay si joogta u sheegayeen hoggaamiyayaashan Yuhuudda oo ka danbeeyay Ciise dhimashadiisii (cf. aayadaha. 30; 2:33; 3:14-15; 4:10). Sidoo kalena waa eedaynta Istafanoos ee ku sugan 7:2.

5:29 “Waa inaannu” waa ereyga *dei* oo macnihiisu yahay waajib. Tani waxa ay tusinaysaa Rasuullada oo ay waajib ku ahayd in ay xaqiiqada ku wacdiyaan iyagoon dan ka galayn waxa ku iman doona (4:19). Eeg fiirada 1:16.

5:30 “Ilaahii awowayaashayo” Masiixiyiintan ugu horreysay waxay rumaysnayeen inay yihiin kuwa ruuxi ahaan runta ku sugan isla markaana ah farcanka dadka Ilaah ee Axdiga Hore (cf. 3:13; Rooma. 2:28-29; Galatiya. 6:16; I Butros. 3:5,9; Muujintii. 1:6).

▣ **“ayaa soo sara kiciyey Ciise”** Axdiga Cusubi waxa uu qirayaan in Aabbuhu sarakiciyay Ciise (cf. Fal 2:24,32; 3:15,26; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30,33,34,37; 17:31; Rooma. 6:4,9) isagoo ansixinaya xaqiiqada ku jirta noloshu iyo waxbarista Ciise. Tanina waa arrintii ugu muhiimsanayd ee wacdintii kaniisaddii ugu horreysay ee *Kerygma* (I Korintos 15).

Sidoo kale waa in la ogaado Axdiga Cusub oo qiraya in Wiilka iyo Ruuxa Quduusku ay ka qayb qaadanayaan qiritaanka dhacdadadan wayn.

1. Wiilka – Yooxanaa 2:19-22; 10:17-18
2. Ruuxa – Rooma. 8:11

▣ **“aad geedka ku deldesheen oo disheen”** tani waxa ay la xidhiidhaa inkaarta Sharciga Kunoqoshadiisa 21:23. Hoggaamiyayaashan diintu waxay Ciise kasoo qaadeen inuu iska dhigayo Masiixa, sidaas darteedna waxay rabeen inay ku dhacdo inkaarta YHWH. Ciise waxa dusha u ritay inkaartii sharciga Axdiga Hore (i.e., nafta denbaabtaa waa inay dhimato [cf. Yexesqeel. 18:4,20] aadanaha oo dhammina way denbaabeen, cf. Rooma. 3:9-18, 23) inaga (cf. Galatiya. 3:13; Kolosay. 1:14). Ciise waxa uu ahaa wanka bilaa iinta ah ee Ilaah kaasi oo naftiisa siiyay dunida (cf. Yooxanaa 1:29; II Korintos. 5:21).

5:31 “Ilaah baa isaga gacantiisa midigeed sare ugu qaaday” ereyga “sare ugu qaaday” Yooxanaa 3:14 waxa loogu tarjumay “kor ugu qaaday” sidoo kalena Filiboy 2:9 waxa loogu tarjumay “kor ugu sarraysiiyay.” Isku tallaabtu waxay Ciise uuga dhignayd sarraysiin (cf. Kolosay. 1:15; II Korintos. 2:14). Ereyada sifaynta ah ee “gacanta midig” waxa ay tusaale u ahayd meesha ay taallo awooddu (Matayos 26:64). Ilaah waa Ruux daa’im ah. lamana tilmaami karo jidhkiisa. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23.

▣ **“Amiir”** aayaddani waxay si cad oo gaara u sheegeysaa Ciise oo ah Masiixa. ereygan oo kalena waxa lagu adeegsaday 3:15, loo tarjumi karo “Xaakin” (NRSV). Waxa loogala jeedi karaa “caaqil,” ama “amiir.” Sidoo kale waxa loogu adeegsaday asaasaha dugsi ama qoys (cf. Cibraaniyada. 2:10; 12:2). Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:15.

▣ **“Badbaadiye”** ereygan waxa qarnigii koobaad lagu adeegsaday duniidii Giriigga iyo Roomaanka ee Kaysar. Waxa uu sheegtay inuu yahay badbaadiyaha dhaqanka iyo nabadda. Ereyo kale ayay Kaysarradu nafhooda u adeegsadeen, laakiin Masiixiyiintu waxay si gaara ugu adeegsadeen Ciise oo ahaa Rabbi (*kurios*). Ereygan “Badbaadiye” Axdiga Hore waxa loogu adeegsaday YHWH (cf. II Samuu’eel. 22:3; Sabuurka. 106:21; Ishacyaah. 43:4,11; 45:15,21; 49:26; 60:16; 63:8). Qorayaasha Axdiga Cusbi in badan ayay tilmaameen ilaahnimada Ciise iyaga oo ku magacaabaya magacyada Axdiga Hore ee YHWH. Fiiro u yeelo sida Bawlos Warqaddiisa uu u qoray Tiitos uu middan uugu samaynayo.

1. 1:3, “Badbaadiyeheenna Ilaah”
2. 1:4, “Badbaadiyeheenna Ciise Masiix”
3. 2:10, “Badbaadiyeheenna Ilaah”
4. 2:13, “Ilaaheenna wayn iyo Badbaadiyeheenna Ciise Masiix”
5. 3:4, “Badbaadiyeheenna Ilaah”
6. 3:6, “Badbaadiyeheenna Ciise Masiix”

▣ **“si uu Israa’iil toobad iyo dembidhaaf u siiyo”** middani waxay tusinaysaa ujeedada dhimashada Ciise (cf. Luukos 24:47 iyo Fal 2:38). Caadi uuma aha qorayaasha Axdiga Cusub in ay towbad keenka ku sheegaan hadiyada ka timid Ilaah (cf. Fal 11:18 [kuwa aan ahayn Yuhuudda]; II Timoteyos. 2:25; sidoo kale waxa suuro gala Rooma. 2:4). Hadiyo goor waa mid ka mida waxyaalaha laga rabo Axdiga Cusub ee aadanaha aqbalaya injiilka (cf. Markos 1:15 iyo Fal 3:16,19; 20:21). Waxa aan u malaynayaa in middani ay tahay qaab lagu toosinayo Ilaah oo raba in aadanaha uu ka sameeyay ekaanshihiisa oo dhami badbaadaan. Mana aha arrin la xidhiidha awoodda wayn ee Ilaah.

Badanaa kuwo diiradda saara qaybta Ilaah ka qaadanayo Axdiga Cusub ayaa aayaddan u adeegsada caddaynta in badbaadadu u ahaatay gebi ahaanba Ilaah iyadoon loo baahnayn in aadanuhu ka qayb qaataan. Si kastaba ha ahaatee, tani waa tusaale fiican oo caddaynta sida qof ujeedadiisa fiqi ahaaneed u dhex geliyo qoraalka. Kitaabku waxa uu si cad u sheegayaa mudnaanta iyo lagama maarmaanimada Ilaah oo wax socodsiiya isla markaana bilaaba, laakiin sidoo kale waxa uu muujinayaa fikirka “axdiga” isaga oo sida wanaagsan u sheegaya qaabka uu kula xidhiidhi karo aadanaha baahan. Xorriyaddu waa hadiyad Ilaah uu siiyay makhluuqaadka, Ilaahna ma fawdeeyo masuuliyadda ama hadiyadda (cf. Rooma. 2:4; II Korintos. 7:10). Ilaah wuu ina jiheeyaa oo inala shaqeyaa isla markaana ina siiyaa jid badbaado (cf. Yooxanaa 6:44,65). Laakiin aadanaha leexday waa in ay ka jawaab celiyaan oo kuna sii socdaan towbad keen, rumaysad, addeecitaan, iyo dadaal.

Tani waa xigasho xiiso leh oo ka ahaatay Frank Stagg, *New Testament Theology*, p. 119:

“Dadku kuma guulaystaan laakiin way helaana towbad keenka, sidaasoy tahayna waa inay aqbalaan. Rumaysad ayaa dadku ku aqbalaan Masiixa shakhsiyaddaas; iyo Masiixa, oo ah ka nolosha ku keena is beddelka isla markaana ka dhiga mid isku hallaysa Ilaah, sidoo kalena nafta waxa uu ka dhigaa mid hoggaansan. Rumaysad yeelashadani waxay dib usoo celin u tahay leexashada uu dadku macnaha uga raadinaya jiritaankiisa.”

▣ **5:32** marar dhowra ayaa Falimaha Rasuullada dhexdooda Butros waxa uu ku sheegay xaqiiqada ay Rasuulladu u yihiin markaati furayaasha Ciise noloshiisa iyo dhimashadiisa iyo sarakicistiisas. Sida halkan ku sugana waxa ay uu ku darayaa “Ruuxa Quduuska ah” oo markaati ah. waxa laga yaabaa in middani tahay qaab loo qirayo labada markaati ee Axdiga Hore lagama maarmaankana u ah arrintan (cf. Tirintii. 35:30; Sharciga Kunoqoshadiisa. 17:6).

Luukos/Falimaha Rasuulladu waxay ka hadlayaan hadiyadda Ruuxa

1. marka baabtiisamka– 2:38
2. marka la addeeco injiilka– 5:32
3. aan la iibsano karin – 8:19-20
4. u ahaadya kuwa aan Yuhuudda ahayn – 10:45; 11:17
5. ka ahaatay Aabbaha – Luukos 11:13 (cf. Yacquub 1:17)

▣ **“kuwa addeeca”** addeecitaanku waa qaab nololeed doorasho ah! waa inay injiilka ku addeecno inagoo rumaysanayna. Waa in aan ku socono addeecitaanka si aan ugu faraxno midhihiisa (cf. Matayos. 7:24-27; Luukos 6:46-48). Ereyga dhifka ah ee “addeec” (*peithomai* lagu daray *arcē*, cf. 27:21; Tiitos 3:1), waxa lagu adeegsaday aayadaha 29 iyo 32, waxaanu koobsanayaa ereyada “xaakin” (*archē*) iyo addeec.

NASB (UPDATED) TEXT: 5:33-39

³³laakiin markay taas maqleen. way ka xanaaqeen, oo waxay ku tashadeen inay laayaan.

³⁴laakiin waxaa shirkii iska dhex taagay mid Farrisiinta ka mid ahaa oo la odhan jiray Gamalii'eel, kaas oo ahaa macallinkii sharciga, dadkuna aad u maamuusi jireen, oo wuxuu amray in nimanka dibadda cabbaar loo saaro. ³⁵Markaasuu iyagii ku yidhi, Niman yahow reer bini Israa'iil, iska jira waxaad la damacsan tihii inaad nimankaas ku samaysaan. ³⁶Maxaa yeelay, hadda ka hor waxaa kacay Tudas, isagoo nin weyn iska dhigaya, kaasoo niman badan oo qiyaas afar boqol gaadhaa raaceen. Isagii waa la dilay, oo intii addeecday oo dhammuna way kala firdheen, oo waxay noqdeen wax aan waxba ahayn. ³⁷Ninkaas dabadiis, waagii dadka la qori jiray, waxaa kacay Yuudas kii reer Galili, oo dad buu duufsaday; isaguna waa dhintay, oo intii addeecday oo dhammuna way kala firdheen ³⁸Haddaba waxaan idinku leeyahay, Nimankan faraha ka qaada oo iska daaya; waayo, taladan ama shuqulkanu hadday dad ka yimaadeen, waa baabi'i doonaan; ³⁹laakiin hadday Ilaah ka yimaadeen, ma baabi'in kari doontaan; haddii kale malaha waxaa la ogaan doonaa inaad Ilaah la diriraysaan.

5:33

NASB “way ka xanaaqeen,”

NKJV “way ka cadhoodeen”

NRSV “way xanaaqeen”

TEV “aad bay u cadhoodeen”

NJB “tani aadbay uuga xanaajisay”

Ereyadani macnaheeda tooska ah waa “way xanaaqeen.” Waxa ay aad uula mid tahay qaabka lagu adeegsaday 7:54, halkaasoo weedha la raaciyay “qalbiga ka jareen” ay tusinayso macnaha masaalka ah oo buuxa (sidookale eeg Luukos 2:35). Erygan xooggan (*diapro*) waxa uu leeyahay macne la mida 2:37a.

▣ **“waxay ku tashadeen inay laayaan”** waa fal aan dhammays tirnayn oo noqonaya (1) waxay in wakhtigan ay isku dayaan layntooda ama (2) inuu ahaa qorshe ama doonis horeba ay u lahaayeen. Aqoonteenna aan ka haysani kaniisaddii ugu horreysay koritaankeeda sida ku sugan Falimaha Rasuullada, #1 ayaa ah macnaha ku habboona. U

firso kuwan cadhadu ka timid waxay ahaayeen Sidukiinta oo iyagaa rabay inay wax laayaan. Waxa suurto gala iyana in Farrisiintu (Gamaliel) uu kaniisaddii u horreysay u arkay inay tahay mid loollan ku keenaysa diidmada Sidukiinta ee guud ahaan ay ku diiddanaayeen sarakicista. Farrisiintu may rabin inay qiraan sarakicidda Ciise, laakiin waxa ay qirayeen fikirka la xidhiidha sarakicidda ee ah mustaqabalka danbe iyadoo lala noolaanayo Ilaah.

Akhristayaasha Kitaabka ee casrigan waxa layaab ku ah hoggaamiyayaasha diinta oo qorsheynayay inay wax dilaan. Xusuusnow kuwani inay ahaayeen Sidukiin u go'ay qoraaladii Muuse, kaasi oo amrayay qofka aflaggaaddo la yimaadda in la dhagxiyo. Haddaba, hoggaamiyayaashani waxay isu arkayeen inay Ilaah metelayaan isla markaasna ku dhaqamayaan eraygiisa (cf. Laawiyyintii. 24:10-16).

5:34 “Farrisiinta” eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: FARRIISIYIIN

- I. Eraygan asalkiisu waxa uu leeyahay waxyaabahan suurto galka ah ee ah sidan:
 - A. “ka socnaan.” Kooxdani waxa ay samaysmeen wakhtigii Makaabiyaanka.
 - B. “Qaybin.” Tani waa macne kale oo la mida asalka Cibraaniga. Qaarkood waxay sheegaan in macneheedu yahay fasiraa (2 Timoteyos 2:15).
 - C. “Aasiyaan.” Waa macne kale oo la mida asalka Aramaatiga. Caqiidooyin ka mida Farriisiintu waxa ay waxyaalo badan la wadaagayeen Aasiyaankii ahaa Zorostarayiinta.
- II. Waxa aysoo samaysmeen wakhtigii Makaabiyaanka oo ka yimid *Hasidim* (kuwo diin leh). Kooxa kala duwanaa sida Esseyiintu waxay ka yimaadeen iyagoo kasoo horjeeday kuna kacanaa Hellenistigii Antiyokh IV Epefaanes. Farrisiiyinta ugu horrayn waxa lagu sheegay Josephus kitaabkiisa *Antiquities of the Jews* 8.5.1-3.
- III. Caqiidooyinkoodii ugu muhiimsanaa
 - A. Rumaysadka imaatinka Masiixa kaasi oo aad u saameeyay qoraallada Yuhuudda sida I Enoch.
 - B. Ilaah oo nolol maalmeedka ku dhex shaqayanaya. Waxa ay tani si toosa ugasoo horjeeday Sudduukiyiinka. Kuwo badan oo ka mid ahaa caqiidada Farriisiinta waxa ay fiqi ahaan kasoo horjeedeen caqiidada Sudduukiinta.
 - C. Jidh ahaan u jajaban nololsha danbe ee ku salaysan tan dunida, kaasi oo koobsanayay abaal marinta iyo ciqaabta (Daanyeel 12:2).
 - D. Awoodda Axdiga Hore iyo Sharci Dhaqameedyada (Talmud). Waxa ay ku baraarugsanaayeen addeecitaanka ammarrada Axdiga Hore iyagoo sidoo kalena ku fasiray oo ku dabay dugsiyadii culimada rabbaaniyiinta. (Shammai, xagjirka iyo Hillel, dhexdhexaad). Fasiraadda rabbaaniyiintu waxa ay ahayd mid ku salaysan dood u dhaxaysay labo faylasuufi oo kala duwanaa, oo mid ahaa xagjir ka kalena ahaa dhexdhexaad. Doodahan caadiga ahi waxa ay tusinayaan macnaha Qorniinka ugu dambayntii loo qoray labada qaab: Talmuudkii Baabiloon iyo Talmuudkii Falastiiniyiinta ee aan dhammayska tirnayn. Waxa ay rumaysnayeen in Muuse uu fasiraaddan hadalka ah ku helay Buur Siinay. Sidoo kalena falaqaynta dhaqan ahaaneed ee taariikhiga ahi waxa la bilaabantay Cesraa iyo “Kuwii ugu sarreeyay Sanagooga” (waxa markii danbe loo bixiyay Sanhedarin).
 - E. Caqiidada la xidhiidha ruuxa iyo Malaa'ignimada. Waxa ay koobsanayeen khayrka iyo sharka labadaba, waxaanay fikraddani ka timid Aasiyaanka iyadoo soo dhex gashay suugaantii Yuhuudda.

MAWDUUC GAAR AH: GAMALII'EEL

- I. Magacan
 - A. Magacan macnihiisu waa “Ilaah waa abaal mariyahayga.”
 - B. Waxa loo yaqaanay “duqa” ama Gamalii'eel I si looga sooco kuwii ka danbeeyay, sidoo kalena

waxa uu ka dhex firfircoonaa hoggaanka Yuhuudda.

II. Ninkan

- A. Dhaqanku waxa uu sheegayaa inuu awow u ahaa Hillel.
- B. Dhaqan kalana wuxuu sheegayaa inuu ku xidhnaa qoyskii boqortooyada ee Herodos (i.e., Agrippa I).
- C. Waxa kaloo dhaqanku sheegayaa inuu ahaa madaxweynaha Sanhadriinka laakiin waxa uu tilmaamayaa Gamalii'eel I.
- D. Waxa uu ka mid ahaa toddobo ka mida Rabbaaniyiinta oo aad loo tix gelin jiray laguna magacaabi jiray Rabban.
- E. waxa uu dhintay ka hor C.D. 70.

III. Fiqigiisii

- ▣ Waxa uu ahaa rabbi aad loo tix geliyo
- ▣ Waxa lagu yaqaanay daryeelka iyo maamulka Yuhuuddii qurbo joogga.
- ▣ Sidookale waxa lagu yaqaanay daryeelka arrimaha bulshada (waxay shaqadiisu badanaa ahayd “faa’ido u ahayd bani aadanimada”).
 - 1. agoomaha
 - 2. carmalka
 - 3. haweenka
- ▣ Waxa uu ahaa Rasuul Bawlos macallinkiisii Yerusaaalem dhexdeeda (cf. Fal 22:3).
- ▣ Fal 5:33-39 waxa uu ku bixinayaa arrin xikmadaysan oo lagu xakamayn karo kaniisaddii ugu horreysay ee Falastiin dhexdeeda.
- ▣ Rabbaanigan waxa loo malaynayay dhimashadiisa in laga yidhi, “Marka Rabban Gamalii’eel oo ah duqu dhinto ammaanta Tawreed way joogsatay daahirsanaanta iyo soocnaantu way baaba’day” (Sot. 9:15), lagasoo qaatay *Encyclopedia Judaica*, vol. 7, p. 296.
- ▣ Waxa la sheegayaa in Gamalii’eel ujeedadiisa xaaladdan aan la hubin. Waxa laga yaabaa inuu sheegayay Farrisiinta oo ka xikmad badan Sidukiinta. Labadan kooxood ee Yuhuudduna jaanis kasta way ku loollami jireen!

5:36-37 “Tudas. . . Yuudas kii reer Galili” Josephus ayaa tibaaxayaa labadan magac ee isku midka ah (cf. *Antiq.* 20.5.1). si kastaba ha ahaatee, waxa uu u habeeyay si kasoo horjeedda sidii laga filayay. Warbixinaha dheeraadka ah ee taariikh ahaaneedna waxa ay tusinayaan in ay ahaayeen labo shakhsi oo lahaa magacan isla markaasna ahaa Yuhuuddii ku kacsanaa Rooma. Haddaba Josephus iyo Axdiga Cusub labaduba way saxsanaan karaan. Ka uu xusay Gamalii’eel waxa uu kacdoon sameeyay C.D. 6, halka Josepus xusay uu kacdoonka sameeyay C.D. 44.

5:37 “waagii dadka la qori jiray” Josephus (cf. *Antiq.* 18.1.1; *Wars* 2.8.1) waxa uu inoo sheegayaa in Augustus uu amar ku bixiyay in Yuhuudda cashuur lagusoo rogo, isla markii Archelaus iyo Quirinius ay sharciga u dejiyeen Siiriya (ku dhowaad C.D. 6-7). Diiwaan gelintan ujeedadeedu ahayd cashuur bixinta waxay iman jiray afar iyo tobankii sanabo mar, laakiin waxay qaadan jirtay sanado lagu dhammays tiro.

▣ **“Yuudaskii reer Galili”** Josephus ayaa marar badan isaga xusay (cf. *Antiq.* 18.1.1-6; 20.5.2 iyo sidoo kale sida ku sugan *Wars* 2.8.1; 2.17.8-9). Kacdoonkiisu waxa uu ahaa C.D. 6 ama 7. Waxaanu ahaa asaasaha dhaqdhaqaaqii siilootiyiinta. Siilootiyintu (Josephus waxa uu ku magacaabayaa “faylosufigii afraad”) iyo Sicarii (shirqoolayaasha) waxa suurto gala inay isku dhaqdhaqaaq siyaasadeed ahaayeen.

5:38 “Nimankan faraha ka qaada oo iska daaya” waa talo layaab leh! weedhani waxay koobsanaysaa labo fal oo amar wakhti tegay ah.

1. *aphistēmi*, faraha ka qaada, iska daaya
2. *aphiēmi*, iska dira, sii daaya

▣ **“haddii”** waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah, oo tusinaysa wax qabad.

5:39 “haddii” Waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah, waxaanay hadiyo jeer tusinaysaa qirtaanka xaqiiqada, laakiin halkan run kuma noqon karto. Waxa ay tusinaysaa qaabka naxwe ahaaneed ee adeegsiga.

▣ **“haddii kale malaha waxaa la ogaan doonaa inaad Ilaah la diriraysaan.”** Waa in la xusuusnaado hoggaamiyayaashan diinta oo u malaynayay inay Ilaah metelayaan. Xaqiiqada Gamalii’eel ku hadlayaana waa suurto galnimada inay khaldan yihiin (11:17).

NASB (UPDATED) TEXT5:40-42

⁴⁰Markaasay ku raaceen isaga; oo intay rasuulladii u yeedheen, ayay garaaceen, oo waxay ku amreen inayan magaca Ciise ku hadlin, markaasay sii daayeen. ⁴¹Markaasay shirkii hortiiisii ka tageen, iyagoo ku faraxsan in lagu tiriyeey inay istaahilaan in Magaca aawadiis loo maamuus jebiyo. ⁴²Maalin walba macbudka dhexdiisa iyo guryahaba kama ay joojin inay dadka baraan oo ku wacdiyaan wax ku saabsan Ciise Masiix.

K

5:40 “Markaasay ku raaceen isaga” weedhani waxa lagu daray aayadda 39 tarjumaadaha qaarkood (NRSV) iyo aayadda 40 tarjumado kale (cf. NASB, NKJV). TEV iyo NJB waxay ku daryaan aayadda. 39, laakiin waxay ku bilaabmaysaa sadar cusub.

▣ **“ayay garaaceen,”** middani lamay mid ahayn garaacitaankii Roomaanka (*mastix*, cf. Fal 22:24-25), kaasoo Ciise lagu sameeyay. Waxa ay middani tilmaamaysaa garaacitaanka Yuhuudda (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 25:3; i.e., *derō*, Luukos 12:47-48; 20:10-11; 22:63). Wuxuu mid xanuun kulul laakiin aan qofka dilaynin.

Dhibaataada fasiraaddu waxay tahay iyadoo labada erey ee Giriigga ah badadanaa loo adeegsado isku bedel. Sabtuujantigu Sharciga Kunoqoshadiisa. 25:3 waa uu ku dhigayaa *mastix*, laakiin waxa ay sheegeysaa garaacitaanka Yuhuudda. Luukos waxa uu si joogto ah u adeegsanayaa *dero* marka uu ka hadlayo garaacitaanka Yuhuudda (macnaha tooska ahi waa “caataynta xayawaan”).

▣ **“oo waxay ku amreen inayan magaca Ciise ku hadlin”** shirkii baa sidan oo kale sameeyay sida aan hore usoo aragnay (cf. 4:17,21). Markanna way garaaceen iyaga sidoo kalena digniin kale ayay siiyeen.

5:41 Ciise waxa uu hore usii sheegay qaab la dhaqanka sidan ah (cf. Matayos. 10:16-23; Markos 13:9-13; Luukos 12:1-12; 21:10-19; Yooxanaa 15:18-27; 16:2-4).

▣ **“iyagoo ku faraxsan in lagu tiriyeey inay istaahilaan in Magaca aawadiis loo maamuus jebiyo”** tani waxay inaga maanta inoola muuqataa layaab waayo waxa aan ku noolnahay bulsho cadaadinta jidh ahaaneed ay dhif tahay, laakiin badanaa rumaystayaasha badanaa xaaladdoodu sidan may ahayn qarniyo.

Ciise si cad ayuu u sheegay in kuwa isaga raacaa silci doonaan. Fadlan akhri Matayos. 5:10-12; Yooxanaa 15:18-21; 16:1-2; 17:14; Fal 14:22; Rooma. 5:3-4; 8:17; II Korintos. 4:16-18; Filiboy. 1:29; I Tesaloniika. 3:3; II Timoteyos. 3:12; Yacquub 1:2-4. Sidoo kale fiiro u yeelo sida ku sugan I Butros Ciise siliciisa (cf. 1:11; 2:21,23; 3:18; 4:1,13; 5:1) oo kuwa isaga raacana ku dhici doona (cf. 1:6-7; 2:19; 3:13-17; 4:1,12-19; 5:9-10).

5:42 “Maalin walba macbudka dhexdiisa” kuwani waxay ahaayeen markhaatiyaashii ugu horeeyay ee Ciise oo diiday in la aamusiiyo, oo xitaa ku aamusi waayay badhtamaha Yuhuudda, macbadka ku yaalla Yerusaaalem.

▣ **“iyo guryahaba”** Kaniisaddii ugu horreeysay waxay kulamadooda gaarka ah ku yeelan jireen guryaha ku faafsan magaalada (2:46). Muu jirin dhisme kaniisadeed ilaa boqolaal sano kaddib.

▣

NASB, NKJV
NRSV, TEV,

“Masiixa”

REB**“Masiixa”**

Dhinacan Yuhuudda magaca “Messiah” (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:31) ayaa aad u habboon (cf. 2:31; 3:18; 5:42; 8:5; 9:22), sida Butros ugu adeegsaday Matayos. 16:16. Sidoo kale Bawlos markuu wacdinayo Yuhuudda waxa uu adeegsaday sidan isagoo u noqonaya Ka la subkay ee la ballan qaaday (cf. 17:3; 18:5,28).

SU’AALAHA FALAQAYNTA EE FALIMAHA RASUULLADA 3-5

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraaga waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay Rasuulladu in badan u dhex joogeen diinta Yuhuudda?
2. Diiwaan geli magacyada Ciise iyo macnohoodu waxa uu yahay kuwaasoo ah kuwa lagu adeegsaday cutubka 3.
3. Maxay yihiin labada waxyaalood ee laga rabo badbaadadu?
4. Maxaa Muuse badanaa wax loogaga soo xigta Axdiga Cusub dhexdiisa?
5. Maxay tahay muhiimadda axdiga Ibraahim uugu jirta kaniisadda Axdiga Cusub?
6. Maxaa loo xidhay Butros iyo Yooxanaa?
7. Guud mar ku samee wacdintii saddexaad ee Butros.
8. Maxay tahay muhiimadda ku jirta tukashada 4:24-31?
9. Run haddii la sheego Axdiga Cususbi ma nidaam hanta wadaag oo kalee? (cf. 4:32)
10. Diiwaan geli sababta Luukos usoo qaatay waxa ku saabsan Ananiyas iyo Safira.
11. Ananiyas miyuu rumaysnaa inuu Shaydaan ka buuxo? Miyuu rumaysnaa inuu been u sheegay Ilaah?
12. Muxuu Ilaah naxariis darradaas u muujiyay?
13. ka waran mucjisooyinka maal meheennan?
14. Maxay Sidukiintu sidaa ugu waallaayeen?
15. Muxuu malagu Rasuullada uuga sii daayay xabsiga?
16. Guud mar ku samee wacdintii Butros ee afraad. Qor waxyaalaha ay wadaagaan iyo waxa u dhexeeya wacdinaha ku sagan Falimaha Rasuullada.
17. Gamalii’eel kumuu ahaa?
18. Maxay Masiixiyiintu uugu farxaan silcinta?

FALIMAHA RASUULLADA 6

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Magacaabiddii Todobada 6:1-6 6:7	Toddobaa loo doortay inay adeegaan 6:1-7	Doorashadii todoabada 6:1-7 (6:8-7:2a)	Toddobadii kalkaaliye 6:1-4 6:5-6 6:7	Asaasitaankii todobada 6:1-6 6:7
Xidhitaankii todobada 6:8-15	Istefanos waxa lagu eedeeyay Ilaah caayis 6:8-15	Wacdintii iyo shahiidnimadii Istefanos (6:8-7:2a)	Xidhitaankii Istefanos 6:8-15	Istefanos xidhitaankiisii 6:8-15

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Cutubyada 6 iyo 7 waa qaabka Luukos uu ku bilaabay ka hadlitaanka adeegga kuwa aan Yuhuudda ahayn.
- B. Kaniisadda Yerusaleem wakhtigan si aada ayay usii koraysay (cf. 6:1).
- C. Kaniisaddu waxay ka koobnayd qolo ku hadlay Aramaati oo Yuhuudda Falastiin ah iyo Yuhuud iyaguna ku hadlayay luqada Giriigga oo qurbo joog ahaa.

NASB (UPDATED) TEXT: 6:1-6

¹Waagaas waxaa dhacay, intii xertu badanaysay. in Yuhuuddii Gariigta ahayd ay ka gunuunaceen Cibraaniyadii, maxaa yeelay, carmalladoodii laga dhintay wixii maalin walba la siin jiray looguma hagar bixin. ²Markaasaa laba-iyo-tobankii, intay isugu yeedheen kuwa badan oo xerta ka mid ahaa. waxay ku yidhaahdeen, Ma wanaagsana inaannu hadalka Ilaah iska dayno oo aannu miisas ka adeegno. ³Haddaba, walaalayaalow, waxaad dhexdiinna ka xushaan toddoba nin oo sharaf leh, oo ay ka buuxaan Ruuxa iyo xigmaddu, oo aynu u dooranno shuqulkan. ⁴Annaguse waxaannu ku sii adkaysan doonnaa tukasho iyo shuqulka hadalka. ⁵Hadalkiina waa ka wada farxiyey dadkii badnaa oo dhan: oo waxay doorteen Istefanos oo ahaa nin ay ka buuxaan rumaysad iyo Ruuxa Qoduuska ahu, iyo Filibos, iyo Barokhoros, iyo Nikanoor, iyo Timoon, iyo Barmenaas, iyo Nikolas kii reer Antiyokh oo diinta soo galay. ⁶Kuwaasay rasuulladii hor keeneen; oo markay tukadeen dabadeed, ayay gacmahoodii saareen.

6:1 “xertu” macnaha xer waxa weeyi “arday” waxaanu ka ahaadya falka *manthano*. Waxa muhiim ah in la garawsado Axdiga Cusub oo aad uuga hadlayay “xer noqoshada” (cf. Matayos. 28:19; Fal 14:21), iyadoon ahayn go’aan ka dhigasho keliya. Arrintan lagu tilmaamayo xertu waxay gaar ku tahay Injiillada iyo Falimaha Rasuullada. Warqadaha xaggooda ereyada “walaalo” iyo “quduusiin” ayaa si gaara loogu tilmaamay kuwa raaca Ciise.

▣ **“badanaysay”** waa fal wakhti xaadirkaas soconayay. Koritaanka hadiyo goor waxa uu soo jiitaa dareenka.

▣ **“gunuunaceen”** ereyadan macnohoodu waa “si gaara oo loo xanshaashaqo” (sheekooyin gaara oo u dhexeeya shakhsiyaad, Moulton, *Analytical Lexicon*, p. 81). Marar badan ayay kusoo aroortay LXX ka Baxniintii oo tilmaamaysa wakhtigii Duurka (cf. Baxniintii. 16:7,8; 17:3; sidoo kale Tirintii. 11:1; 14:27). Ereygan mid la mida waxa laga helayaa Luukos 5:30 iyo marar dhowra Yooxanaa (cf. 6:41,43,61; 7:12,32).

▣ **“Yuhuuddii Gariigta ahayd ay ka gunuunaceen Cibraaniyadii”** middani waxay sheegaysaa Yuhuuddii rumaysadka lahaa, kuwaas oo ka socday Falastiin isla markaasna ku hadli jiray Aramaatiga iyo kuwii qurbaha ku noolaa ee ku hadli jiray luqada Koine ee Giriigga. Xaaladdan dhexdeeda waxa taagnaa arrimo la xidhiidha dhaqanka iyo cirqiga.

▣ **“wixii maalin walba la siin jiray”** kaniisaddii ugu horreysay waxay ku daydeen Sanagooga. Waxyaalaha la bixiyo usbuuc kasta (sadaqada) waxa loo ururin jiray si loogu quudiyo saboolka. Lacagtan waxa loo adeegsaday si cunto loogu iibiyo, taasi oo usbuuc kasta uu bixin jiray Sinagoogu sidoo kalena maalin kasta ayay bixin jirtay kaniisaddu. Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:2.

Taariikhda waxay uuga muuqataa in qoysas badan oo Yuhuud ah oo ku noolaa isla markaana ka shaqaynayay waddamada kale ay usoo laabteen Falastiin si markaas ay uugu suurto gasho in hadhow lagu aaso Dhulkii Ballanqaadka. Haddaba waxa jiray, carmal badan oo ku sugnaa Falastiini gaar ahaan agagaarka Yeruusaalem. Diinta Yuhuuddu waxay lahayd sharci daneeya kuwa saboolka ah, kuwa aan waxba haysaan iyo carmalka (cf. Baxniintii. 22:21-24; Sharciga Kunoqoshadiisa. 10:18; 24:17). Qoraalka Luukosna waxa uu tusinayaa in sidoo kale Ciise uu daryeelay carmalka (cf. Luukos 7:11-15; 18:7-8; 21:1-4). Haddaba waa shay dabiici ah in kaniisaddii ugu horreysay ay ku dayato sinagooga iyagoo bulshada u adeegaya isla markaana baraya waxbaristii Ciise, waxaanay ahayd in la daneeyo dumarka carmalka ah.

▣ **6:2 “laba-iyo-tobankii”** waa magaca guud ahaan loo yaqaanay Rasuullada ku sugan Falimaha Rasuullada. Waxay ahaayeen kuwii ugu horraynba sida gaarka ah uu u doortay Ciise wakhtigii adeeggiisa ugu horreeyay, oo ka bilaabmayay Galili.

▣ **“intay isugu yeedheen kuwa badan oo xerta ka mid ahaa”** waxa aan la hubin halkan waxa loogala jeedo iyo haddii kaniisaddu ay ka koobnayd dhowr kun oo qof, isla markaana aanay jirin meel dooqda dadka oo dhan si

ay ugu kulmaan. Tani waxa ay ka dhacday Macbadka laftiisa, waxaanay ahayd balbaladii Sulaymaan (cf. 3:11; 5:12).

Kani waa tusaalaha ugu horreeya ee kulamadii ugu horreeyay (cf. aayadaha. 3,5; 15:22). Tani waa mid ka mida saddex siyaabood oo kaniisadda casriga ahi isu nidaamiso:

1. Episcopal ka (i.e., hoggaamiye keliya oo sare)
2. Presbyterian ka (i.e., kooxo hoggamiyayaal ah)
3. congregational ka (i.e., gebi ahaanba rumaystayaasha)

Dhamaantood waxa laga helayaa Fal 15.

▣ **“Ma wanaagsana inaannu hadalka Ilaah iska dayno oo aannu miisas ka adeegno.”** Tani maaha erey dheel dheela oo ku saabsan adeegga, laakiin waa bilowga baahida loo qabo isku qaybtinta masuuliyadaha dhex yaalla dadka Ilaah. may ahayn xafiisyo laakiinse waa adeeg is xilqaamid ah. masuuliyadda faafinta injiilku waa in ay lahaato muhiimadda koobaad. Rasuullada si gaara ayaa loogu yeedhay in ay shaqadan qabtaan, sidaasi darteedna ma jirto wax iyaga shaqada ka fogaynayaa. Tanina waxay ahayd xaaladda aan lahayn doorasho kale.

Ereyga “adeeg” waxa uu ka ahaaday ereyga Guud ee Giriigga loogu isticmaalo adeegga *diakonia*. Waxa nasiib darro ah iyada oo mufasiriin badani ay middan u arkaan si la mida xafiis oo kale (cf. Filiboy. 1:1; I Timoteyos. 3:8-10,12-13), waxaanay middan u adeegsadeen shaqada adeegga. Si kastaba ha ahaatee, kuwani maaha wadaaddo maamulayaal ah, laakiin waa adeegayaal ama wacdiyayaal. Wax u eeg wadaadadu waxay u eegtahay in laga heli karo Falimaha Rasuullada 6. Waxa aad ii xiiso geliyay sida kaniisaddii hore u socodsiisay adeegga iyada oo aanay jirin dhismayaal.

1. Marka ay kulmayaan waxay ahayd inay ku kulmaan Macbadka.
2. Maalmaha Sabtida waxay ku kulmi jireen sinagoogyadooda halka maalmaha Axaddana ay kaga kulmi jireen guryo kaniisadeedkooda.
3. Usbuuca oo dhan maalin kastana Rasuulladu waxay u kala gooshi jireen guryaha rumaystayaasha (2:46).

6:3

NASB, NRSV “xushaan”

NKJV “raadisaan”

TEV “doorataan”

NJB “waa inaad iska xushaan”

Waa fal tusinaaya amar. Waa in wax la sameeyo si loo sameeyo midaysnaan iyo isku ruux. Arrinta la xidhiidha wadaadnimada waxa ay tahay mid saamaynasa injiilka. Kaniisaddu waa inay isu habayso adeegga. Rumayste kasta waxa uu yahay mid loo yeedhay, hadiyad leh, isla markaana ah adeege buuxa (cf. Efesos. 4:11-16).

▣ **“toddoba”** ma jirto sabab kale oo tiradan loo adeegsaday marka laga reebo isga oo ahaa tiro wanaagsan Axdiga Hore dhexdiisa, waayo waxa weeyi toddobada maalmood ee abuuritaanka (cf. Bilowgii 1; Sabuurka104). Axdiga Hore dhexdiisa tusaale nidaamkan oo kale ah oo hoggaanka ah (Tirintii 18). Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3.



NASB, NJB “oo sharaf leh”

NKJV “oo sharaf leh”

NRSV “oo joog fiican leh”

TEV “kuwaasoo la yaqaano inay”

Farqiga u dhexeeya tarjumaadaha Ingiriisidu waxay ka tarjumayaan labada adeegsi ee ereygan.

1. “u markhaati fura” ama bixiya warbixin ku saabsan (cf. TEV, NIV)
2. “si wanaagsan wax uga hadla” (cf. Luukos 4:22).

▣ **“ka buuxaan Ruuxa”** ka buuxsamitaanka Ruuxa marar badan ayaa lagu dhex sheegay Falimaha Rasuullada iyagoo hadiyo goor la xidhiidha Labo iyo Tobanka iyo wacdintooda/adeeggooda gaadhitaanka ah. waxa ay tusinaysaa awoodda laga rabo adeegga. Ruuxa oo qofka ku dhex jiraa waxay lagama maarmaan u tahay qofka.

Waxa ay taasi caddayn u tahay fikirka, waxqabadka iyo tayo lahaanshaha. Wax tarista carmalku waa muhiim, laakiin waxa muhiimadda koobaad iska leh faafinta injiilka (aauudda 4). Eeg fiirada 5:17.

▣ **“iyo xigmaddu”** waxa jira labo nooc oo Axdiga Hore dhexdiisa xikmadda ah.

1. kasbashada aqoonka
2. nolosha xikmaddu ku dheehantahay

Toddobadan ninna labadaba way lahaayeen!

▣ **“oo aynu u dooranno shuqulkan”** waxa ay lahaayeen shaqo loogu talo galay. Halkan looma adeegsan karo sheegitaanka in wadaadadu ay maamulayaan waxyaalaha la qabanayo (KJV “shaqooyinkan”) kaniisadda! Ereyga “shuqul” (*chraomai*) macnihiisu waa “baahi,” mana aha “xafiis” (Alfred Marshall, *RSV Interlinear*, p. 468).

6:4 “ku sii adkaysan doonnaa tukasho” ereyadan Giriigga ah waxa loo adeegsaday macnoyaal dhor ah.

1. iyadoo cid loo dhowaado , Fal 8:13
2. si shakhsi ahaaneed oo cid loogu adeego, Fal 10:7
3. wax oo daacad loo noqdo
 - a. xertii hore waxay ahayd inay wax baraan oo tukadaan Fal 1:14
 - b. xertii hore oo wax ka baranaysay Rasuullada Fal 2:42
 - c. xertii hore oo wax is baraysay, Fal 2:46
 - d. rasuullada oo u tukanaya adeegga iyo Ereyga, Fal 6:4 (Bawlos ereygan oo kale ayuu u adeegsanayaa isagoo rumaystayaasha ugu baaqaya tukasho, Rooma. 12:12; Kolosay. 4:2).

▣ **“tukasho iyo shuqulka hadalka”** weedhan xagga Giriigga waxa la dhigay xagga hore si loo xoojiyo. Miyaanay arrin iska hor imanaysa ahayn in “toddobadan” ay noqdeen kuwii ugu horreeyay ee qaada faafinta injiilka oo ka ahayn Rasuullada. “toddobada” ayay ahaayeen kuwii wacdintooda lagu qasbay inay ka go’aan diinta Yuhuudda manay ahayn Rasuullada.

Waxa arrin lala yaabo ah iyada oo Rasuulladu aanay ahayn kuwii bilaabay baahinta warka wanaagsan, laakiin waxa sameeyay Yuhuuddan ku hadli jirtay Giriigga. Falimaha Rasuulladu ma diiwaan gelinayo iyagoo buuxiyay shaqadii Rasuulladu u magacaabeen laakiinse wuxuu ku tilmaamayaa waadiyayaasha injiilka. Xirfaddoodu waxay u muuqataa inay arrintan ku lug lahaayeen halkii ay ka qaban lahaayeen hawlaha maamulka ee kaniisadda Yerusaalem. Halkii ay nabad ka keeni lahayd ayaa adeegoodu wuxuu keenay khilaaf iyo silcin!

6:5 “Istefanos” magaciisu waxa uu la macno yahay “halka ugu sarraysa guusha.” Dhammaanba toddobadu waxay lahaayeen magacyo Giriig ah, laakiin badanaa Yuhuuddii ku noolaa qurbuhu waxay lahaayeen magac Cibraani ah iyo mid Giriig ah. magacyada oo keli ahina tusin maayaan in dhammaantood ay ahaayeen Yuhuud ku hadli jirtay luqada Giriigga. Sababtuna waxa laga yaabaa in labada kooxoodba isku jireen.

▣ **“ka buuxaan rumaysad”** ereyga rumaysad waxa uu ka yimid erey Axdiga Hore (*emeth*) kaasoo asal ahaan loogala jeedo shakhsi cagaha ku taagan oo sugan. Waxa lagu shabahay qof lagu kalsoonaan karo, iimaan leh, la isku hallayn karo daacadna ah. Axdiga Cusub dhexdiisa ereygan waxa loogu adeegsaday rumaystayaasha ka jawaab celiya ballan qaadka Ilaah iyaga oo usii maraya rumaysanayana Masiixa. waxa aan ku kalsoonahay runsheegnimadiisa! Waxa aan ku kalsoonahay isagoo ah mid la isku hallayn karo. Istefanos wuxuu talo saartay Ilaah runsheegnimadiisa, sidaasi darteedna waxa uu ku dayday dabecadda Ilaah (rumaysad ka buuxo, rumaysadnimo leh).

MAWDUUC GAAR AH: AAMINIS, ISKU HALLAYN, RUMAYSAD, IYO RUMAYSAD YEELASHADA AXDIGA HORE DHEXDIISA

I. Odhaahda Furitaanka

Waxa u baahan in la sheego adeegsiga fahankan fiqi ahaaneed oo Axdiga Cusub dhexdiisa aad muhiim uga ah, iyadoo sidaas oo kalena aan loogu dhex qeexin Axdiga Hore dhexdiisa. Waa hubaal oo waa lagu dhex sheegay, laakiinse badanaa waxay khusaysaa oo u gaartahay meelo gaara iyo

shakhsiyaad mucayan ah. Axdiga Hore wuxuu isku dhex daryaa

A. Bulshada iyo shakhsiyaadka

B. Kulanka shakhsi ahaaneed iyo adeecitaanka axdiga

Rumaysadku haddaba wuxuu si gaara ula kulmaa shakhsiyaad sidoo kalena waa wax ku dhisan qaab nololeedka maalin walba! Iyadoo keli ahaan eraygan la qeexana waxa ka fudud iyada oo qof lagu tilmaamo. Haddaba, dhinacyada ugu wanaagsan ee shakhsiyaadka lagula xidhiidhiyay waxa aan kasoo qaadan karnaa

A. Ibraahim iyo farcankiisa

B. Daa'uud iyo Israa'iil

Haddaba nimankani waxa ay ahaayeen kuwo la kulmayo Ilaah iyada oo kaddibna noloshoodu is bedeshay (maaha nolol wanaageedu dhammays tiran yahay laakiin rumaysadkooda ayaa sii socday). Tijaabinta ayaa waxay u muujisay awoodda iyo taag yaraanta rumaysadkooda la kulmay Ilaah, hase ahaatee isku hallaynta iyo u dhowaanshihiisa ayaa wuxuu ahaa marba marka ka danbaysa sii socda. Way tijaabiyeen, laakiinse waa ay kusii socdeen iyada oo taasna ay cadaynaysay ducadooda iyo qaab nololeedkooda.

II. Asalka ugu muhiimsan ee la adeegsaday

A. *ṣ* (BDB 52)

1. FAL

- a. *Qal* asalkeeda – taageeris, nafaqayn (2 Boqorradii 10:1,5; Esteer 2:7, adeegsiga aan fiqiga ahayn)
- b. *Niphal* asalkeeda – la hubiyo, la asaaso, la ansixiyo, lagu kalsoonaan karo amaba aaminimada
 - (1) Niman, Ishacyaah 8:2; 53:1; Yeremyaah 40:14
 - (2) Waxyaalo, Ishacyaah 22:23
 - (3) Ilaah, Sharciga Kunoqoshadiisa 7:9,12; Ishacyaah 49:7; Yeremyaah 42:5
- c. *Hiphil* asalkeeda – in lagu taagnaado, la aamino, la talo saarto
 - (1) Ibraahim Ilaah ayuu aaminay, Bilowgii 15:6
 - (2) Israa'iiliyiintii Masar ku sugnaa way rumaysteen, Baxniintii 4:31; 14:31 (inkiraad, Sharciga Kunoqoshadiisa 1:32)
 - (3) Israa'iiliyiintu YHWH waxay ku rumaysteen la hadalkii Muuse, Baxniintii 19:9; Sabuurka 106:12,24
 - (4) Axaas iskuma hallayn Ilaah, Ishacyaah 7:9
 - (5) Midkasta oo rumaysta isaga, Ishacyaah 28:16
 - (6) Aamin runta ku saabsan Ilaah, Ishacyaah 43:10-12

2. MAGAC (LAB AH) – runsheegnimada (Sharciga Kunoqoshadiisa 32:20; Ishacyaah 25:1; 26:2)

3. FALKAABE – runtii, dhab ahaantii, waan taageersanahay, waa sidaa (Sharciga Kunoqoshadiisa 27:15-26; 1 Boqorradii 1:36; 1 Taariikhdii 16:36; Ishacyaah 65:16; Yeremyaah 11:5; 28:6). Waana midda ka tarjumaysa adeegsiga “Aamiin” ee Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub.

B. *ṣ* (BDB 54) MAGAC DHEDIG AH, ku taagni, runsheegnimo, xaqiiqada

1. Niman, Ishacyaah 10:20; 42:3; 48:1
2. Ilaah, Baxniintii 34:6; Sabuurka 117:2; Ishacyaah 38:18,19; 61:8
3. Xaqiiqada, Sharciga Kunoqoshadiisa 32:4; 1 Boqorradii 22:16; Sabuurka 33:4; 98:3; 100:5; 119:30; Yeremyaah 9:4; Sekaryaah 8:16

C. *ṣ* (BDB 53), ku taagni, u go'itaan, u hogaansanaan

1. Gacmaha, Baxniintii 17:12
2. Wakhtiyada, Ishacyaah 33:6
3. Aadahna, Yeremyaah 5:3; 7:28; 9:2
4. Ilaah, Sabuurka 40:11; 88:12; 89:2,3,6,9; 119:138

III. Bawlos iyo adeegsigiisa fikraddan Axdiga Hore

- A. Bawlos fahankiisna cusub ee ku saabsan YHWH iyo Axdiga Hore waxa uu ku salaynayaa shakhsi ahaantiisa sidii uu ula kulmayo Ciise markii uu u socday Dimishiq (Falimaha Rasuullada 9; 22; 26).
- B. Wuxuu helay Axdiga Cusub oo fahankiisa ku taageeraya siyaabaha la xidhiidha asalka arrintan.
1. Bilowgii 15:6 –Ibraahim la kulankiisii shakhsi ahaaneed ee Ilaah uu la bilaabay (Bilowgii 12) waxa ka dhashay nolol ku salaysan addeecitaan iyo rumaysad (Bilowgii 12-22). Waxaanu Bawlos middani ku tibaaxayaa Rooma 4 iyo Galatiya 3.
 2. Ishacyaah 28:16 – kuwa aamina middani (tijaabada iyo ku taagnaanshaha arrintas aasaaska ah) weligood ma noqon doonaa
 - a. Rooma 9:33, “ceebooba” amaba “niyad jaba”
 - b. Rooma 10:11, kuwo ceeboobi
 3. Xabaquuq 2:4 – kuwa yaqaana Ilaah runsheegga ahi waxay ku noolaan doonaan nolol rumaysad leh (Yeremyaah 7:28). Bawlos wuxuu qoraalkan ku adeegsanayaa Rooma 1:17 iyo Galatiya 3:11 (sidoo kale u fiirso Cibraaniyada 10:38).

IV. Butros iyo adeegsigiisa fikiradan Axdiga Hore

- A. Butrus wuxuu isku xidhayaa
1. Ishacyaah 8:14 – 1 Butros 2:8 (dhagax lagu turun turroodo)
 2. Ishacyaah 28:16 – 1 Butros 2:6 (dhagax geeseed)
 3. Sabuurka 111:22 – 1 Butros 2:7 (dhagaxii kuwa wax dhisaa diideen)
- B. Wuxuu ka soo jeedinayaa luqadii gaarka ahayd ee tilmaamaysay Israa’iil, “ kuwa la doortay, boqorrada wadaadnimada, ummadda quduuska ah, dadka Ilaah matalaya”
1. Sharciga Kunoqoshadiisa 10:15; Ishacyaah 43:21
 2. Ishacyaah 61:6; 66:21
 3. Baxniintii 19:6; Sharciga Kunoqoshadiisa 7:6

Isagoo iminkana u adeegsanaya rumaysadka kaniisadda ee ku salayan Masiixa.

V. Yooxanaa iyo adeegsigiisa fikraddan Axdiga Hore

A. Adeegsigiisa Axdiga Cusub

Erayga “aaminay” waxa laga soo qaatay erayga Giriigga ah ee (*pisteuō*), kaasi oo sidoo kale loo tarjumi karo “aaminis,” “rumays,” amaba “talo saarasho.” Tusaale ahaan, MAGACU kumuu soo dhex aroorin Injiilka uu qoray Yooxanaa, laakiinse FALKA in badan ayaa lagu dhex adeegsaday. Yooxanaa 2:23-25 lama hubo in dadka soo ururay ee diyaarka u ahaa raacitaanka Ciisihii reer Nasereet. Tusaalayaasha kale ee sida aadka ah loogu adeegsaday eraygan “rumaysi” ayaa waxa aan ka arki karnaa Yooxanaa 8:31-59 iyo Falimaha Rasuullada 8:13, 18:24. Haddaba, xaqiiqada rumaysadka ee kitaabiga ahi waxay ka badan tahay rumaysadka ugu horreeya oo keliya. Waxa la rabaa inay noqota wax sii socda oon kala go’aynin (Matayos 13:20-22, 31-32).

B. Adeegsigiisa marka ay la socdaan MEELEEYAYAASHU

1. *eis* oo macneheedu yahay “gudihiiisa.” Qaab dhismeedkan gaarka ahi wuxuu xoojinayaa rumaystayaasha oo rumaysadkooda iyo isku hallayntooda dhex dhigay Ciise.
 - a. magaciisa (Yooxanaa 1:12; 2:23; 3:18; 1 Yooxanaa 5:13)
 - b. Isaga (Yooxanaa 2:11; 3:15,18; 4:39; 7:5,31,39,48; 8:30; 9:36; 10:42; 11:45, 48; 17:37,42; Matayos 18:6; Falimaha Rasuullada 10:43; Filiboy 1:29; 1 Butros 1:8)
 - c. Anigu (Yooxanaa 6:35; 7:38; 11:25,26; 12:44,46; 14:1,12; 16:9; 17:20)
 - d. Wiilka (Yooxanaa 3:36; 9:35; 1 Yooxanaa 5:10)
 - e. Ciise (Yooxanaa 12:11; Falimaha Rasuullada 19:4; Galatiya 2:16)
 - f. Iftiinka (Yooxanaa 12:36)
 - g. Ilaah (Yooxanaa 14:1)
2. *en* oo macneheedu yahay “gudaha” sida ku sugan Yooxanaa 3:15; Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 5:14
3. *epi* oo macneheedu yahay “gudaha” amaba “galis” sida aan ka arki karno Matayos 27:42;

Falimaha Rasuullada 9:42; 11:17; 16:31; 22:19; Rooma 4:5, 24; 9:33; 10:11; 1 Timoteyos 1:16; 1 Butros 2:6.

4. XAALADDA KU TIRINTA iyadoo aanu la soconin MEELEEYE sida aan ka arki karno Galatiya 3:6; Falimaha Rasuullada 18:8; 27:25; 1 Yooxanaa 3:23; 5:10
5. *hoti* oo macneheedu yahay “rumaysanahay” oo tusinaysa waxa la rumaysanayaa wuxuu koobsanayo
 - a. Ciise waa Kan Quduuska ah ee Ilaah (Yooxanaa 6:69)
 - b. Ciise waa Isagii (Yooxanaa 8:24)
 - c. Ciise wuxuu ku dhex jiraa Aabbaha, oo Aabbuhuna isaguu ku dhex jiraa (Yooxanaa 10:38)
 - d. Ciise waa Masiixa (Yooxanaa 11:27; 20:31)
 - e. Ciise waa Wiilka Ilaah (Yooxanaa 11:27; 20:31)
 - f. Ciise waxa soo diray Aabbaha (Yooxanaa 11:42; 17: 8,21)
 - g. Ciise wuxuu la mid yahay Aabbaha (Yooxanaa 14:10-11)
 - h. Ciise wuxuu ka yimid Aabbaha (Yooxanaa 16:27,30)
 - i. Ciise wuxuu naftiisa ku magacaabay magacii axdiga ee Aabbaha, “Isaga”(Yooxanaa 8:24; 13:19)
 - j. Waxaan la noolaan doonnaa Isaga (Rooma 6:8)
 - k. Ciise wuu dhintay waanu sarakacay (1 Tesaloniika 4:14)

VI. Gebogabada

Rumaysadka kitaabiga ahi waa dadka oo ka jawaab celiya erayga Waxyiga ah iyo ballan qaadkiisa. Ilaah had iyo waxbuu socodsiyaa (Yooxanaa 6:44,65), laakiinse qaybta ka midka ah Waxyigan xidhiidhinta ayaa ah baahida aadanuhu u qabaan inay kaga jawaaba celiyaan

A. Isku hallayn

B. Addeecitaanka axdiga

Rumaysadka kitaabiga ahi waxa weeyi

1. Xidhiidh shakhsi ahaaneed (rumaysadka koobaad)
2. Rumaysashada xaqiiqada kitaabiga ah (rumaysashada waxyiga Ilaah)
3. In si haboon loo addeeco loogana jawaaba celiyo (rumaysadka maalin walba)

Rumaysadka kitaabiga ahi maaha tigidh lagu tago janada amaba siyaasad uu ku jiro damaanad qaad, laakiin waa xidhiidh shakhsi ahaaneed. Waa ujeedada loo abuuray aadanaha iyada oo laga sameeyay ekaanshaha (Bilowgii 1:26-27) Ilaah. Arrintu haddaba waa “xidhiidh.” Ilaah wuxuu u baahan yahay weheshi in lala yeesho, laakiinse maaha heerka laga taagan yahay fiqi ahaan! Haddaba weheshiga Ilaaha quduuska ah lala yeelanayaa waa mid dalbanaya in carruurta ay ka tarjumaan oo muujiyaan dabeecadda Ilaah (quduusnimda, Laawiyiintii 19:2; Matayos 5:48; 1 Butros 1:15-16). Leexashadu (Bilowgii 3) waxay saamaysay kartideennii ahayd inaan si saxa u jawaab celino. Sidaasi darteedna, Ilaah wuxuu ka jawaab celiyay arrintaas (Yexesqeel 36:27-38), isaga oo ina siinaya “qalbi cusub” iyo “ruux cusub,” taasi oo rumaysadka iyo toobad keenka inoogu suurto gelinaysa inaan weheshi la yeelano oo addeecno isaga!

Dhammaanba saddexdani waa kuwo muhiim ah, waana in saddexdanba la wada sameeyo. Ujeedadu waxa weeyi in la ogaado oo la garto Ilaah (macnaha ay samaynayaan Cibraaniyada iyo Giriigguba) iyo in dabeecaddiisu ay ka muuqato qaab nololeedkeenna. Ujeedada rumaysadku maaha inaan maalin ku tegi doono janada. Laakiinse waa la midnimada Masiixa ee maalin walba!

Rumaysashada aadanuha ayaa ah natijada (Axdiga Cusub), mana aha waxyaalaha ku salaysan (Axdiga Hore) ee ah xidhiidhka lala yeelanayo Ilaah: rumaysadka aadanuhu ka qabaan runsheegnimadiisa; kalsoonida aadanuhu ka qabaan isku hallayntiisa. Aragtida halbowlaha u ah Axdiga Cusub badbaadadiisu waa in aadanuhu ay ka jawaaba celiyaan ooo kusii socdaan nimcada iyo naxariista Ilaah ee ku timid Masiixa. Wuu jeclaaday, wuu soo diray, wuu ku deeqay; inaguna waa inaan kaga jawaab celino rumaysad iyo runsheegnimo (Efesos 2:8-9 iyo 10)!

Ilaah runsheega ahi wuxuu rabaa dad runsheeg ah si uu kuwa aan rumaysadka lahayn ugu muujiyo naftiisa iyo si uu iyaga ugu keeno rumaysadkiisa.

▣ **“ka buuxaan....Ruuxa Quduuska ahu”** waxa jira weedho badan oo tilmaamaya adeegga Ruuxu siinayo rumaystayaasha.

1. dhiirri gelinta Ruuxa (cf. Yooxanaa 6:44,65)
2. ku baabtiisa Ruuxa (cf. I Korintos. 12:13)
3. midhaha Ruuxa (cf. Galatiya. 5:22-23)
4. hadiyadaha Ruuxa (cf. I Cor. 12)
5. ka buuxsamidda Ruuxa (cf. Efesos. 5:18).

Ruuxa oo laga buuxsamaa waxay ka dhigantahay labo waxyaalood: (1) in qofku uu badbaaday (Rooma 8:9) iyo (2) in qofka uu hagayo Ruuxu (Rooma 8:14). Waxay u muuqataa ka buuxsanaanta qofku inay la xidhiidho sida hadiyo goorba looga buuxiyo (falka wakhti xaadirka jooga oo amar ah sida ku sugan Efesos 5:18). Wax ku saabsan “ka buuxsanaan” eeg fiirada 5:17.

▣ **“Filibos”** waxa jira Filibosyo dhowra oo ku sugan Axdiga Cusub. Kani wuxuu ka mid ahaa Toddobadiid, magaciisuna wuxuu ka dhigan yahay “fardo jeclaade.” Adeeggiisa waxa lagu xusay Fal 8. Waxa uu ka adeegay Samariya sidoo kale markhaati shakhi ahaaneed wuxuu u ahaa sirkaalkii ka socday Ethiopia. waxa lagu magacaabay “wacdiyaha” sida ku sugan Fal 21:8 sidoo kalena hablihiisu waxay ka shaqaynayaan adeegga (i.e., nebiyado, cf. Fal 21:9, eeg Mawduuca Gaarka ah: 2:17).

▣ **“Barokhoros”** shakhsi wax yar ayuunbaa laga yaqaanaa. Sida ku sugan *The International Standard Bible Encyclopedia*, vol. 4, James Orr (ed.) waxa uu sheegayaa inuu Nikomediya ka noqday wadaad isla markaana uu ku shahiiday Antiyokh (p. 2457).

▣ **“Nikanoor”** ninkan isaga waxba laga garan maayo marka la eego taariikhda kaniisadda. Magaciisuna luqada Giriigga waxa uu kula macno yahay “guulayste”

▣ **“Timoon”** ninkan isna waxba laga garan maayo marka la eego taariikhda kaniisadda. Magaciisuna waxa uu ka dhigan yahay xagga Giriigga “sharaf leh.”

▣ **“Barmenaas”** waa iyadoo la soo gaabiyaya *Parmenides*. Dhaqanka kaniisaddu waxa uu sheegayaa inuu ku shahiiday Filibos wakhtigii xukunkii Trajan (cf. *The International Standard Bible Encyclopedia*, vol. 4, p. 2248).

▣ **“Nikolas kii reer Antiyokh oo diinta soo galay”** warbixin badan ayaa ninkan laga bixiyay waayo magaaladiisu waxa laga yaabaa inay ahayd halkuu deganaa Luukos. Qofka ku soo biira diinta Yuhuudda waxa laga rabay saddex waxyaalood:

1. qofkaas waxa lagu baabtiisi jiray goob markhaatiyo joogaan
2. haddii qofkaasi uu nin yahay waa in la gudo
3. haddii qofkastii uu heli karo jaaniska waa inuu qurbaan ku bixiyo macbadka.

Waxa jira xoogaa wareera oo ku saabsan ninkan marka la eego taariikhda kaniisadda maxaa yeelay waxa jiro magacyo dhowra oo kiisa la mida lana xusay sida ku sugan Muujintii. 2:14-15. Kuwo ka mida aabbayaashii hore ee kaniisadda (i.e., Irenaeus iyo Hippolytus) waxay u malaynayaan inuu ahaa kii aasaasay kooxdan. Badananaa aabbayaasha kaniisada oo sheegay inuu xidhiidh wada leeyahay ayaa waxay u malaynayaan in kooxdu ay adeegsatay magaciisa iyagoo isku dayaya inay ka hadlaan asaasohooda oo hoggaamiye ka ahaa kaniisaddii Yeruusaalem.

6:6 “ayay gacmahoodii saareen” naxwe ahaan waxa ay tusinaysaa in kaniisaddii oo dhami ay gacanta saartay iyaga (13:1-3), in kasta oo magac u yaalku cidda uu u laabanayo uu shaki gali karo.

Kaniisadda Kaatoliga ee Roomaanka ayaa adeegsatay aayado la mida kan iyagoo sheegayaa Rasuullada. Xagga Baabistiga waxa aan ku adeegsanaa aayado tan la mid ah marka laga hadlayo subkista (dadka loo dooranayo adeeg gaar ah). haddii ay run tahay in rumaystayaasha oo dhan loo yeedhay iyagoo ah adeegayaal hadiyad leh (cf. Efesos. 4:11-12), markaa farqi kuma kala laha Axdiga Cusub dhexdiisa “dadka kaniisadda” iyo “wadaadadu.” Waxyaalaha ku xeeldheeraashada ah waxa lagu saleeyay waxyaalo aanu oggolayn kitaabku waxaana la rabaa in

dib loo itixaamo laguna eego iftiiminta Qorniinka Axdiga Cusub. Gacan saaristu waxa ay noqon kartaa mid la adeegsado, laakiin maaha wax ku taagan awood gaar ah. dhaqamo badan oo ah madaahibteenu taariikh ahaane ama mad-hab ahaan waxay ku salaysan yihiin waxbaris kitaabi ah oon caddayn. Dhaqanku dhibaato maaha ilaa inta aanu gaadhin heerka awoodda Qorniinka.

MAWDUUC GAAR AH: GACAN SAARISTA KU SUGAN KITAABKA

Calaamadda shakhsigu wax kaga qayb qaadanayo siyaabo kala duwan ayaa loogu adeegsaday Kitaabka dhexdiisa

1. ballan qaadista (i.e., gacanta ka hoosaysa lugta [Bilowgii. 24:2,9; 47:29])
2. isu dhaafista hoggaaminta qoyska (cf. Bilowgii. 48:14,17,18)
3. magacaabista dhimashada xawayaanka qurbaanka loo bixiyo
 - a. wadaaddada (cf. Baxniintii. 29:10,15,19; Laawiyiintii. 16:21; Tirintii. 8:12)
 - b. dadka sare (cf. Laawiyiintii. 1:4; 3:2,8; 4:4,15,24; II Korintos. 29:23)
4. dadka oo si gaara loogu magacaabo adeegga Ilaah (cf. Tirintii. 8:10; 27:18,23; Sharciga Kunoqoshadiisa. 34:9; Fal 6:6; 13:3; I Timoteyos. 4:14; 5:22; II Timoteyos. 1:6)
5. ka qayb qaadashada dhagxinta dembiilaha (cf. Laawiyiintii. 24:14)
6. afka oo gacanta la saaro iyadoo tusinaysa aamusnaan (cf. Xaakinnadii. 18:19; Ayuub 21:5; 29:9; 40:4; Miikaah 7:16)
7. qofka oo madaxa gacanta saara iyadoo ka tusinaysa murugo (II Samuu'eel. 13:19)
8. helitaanka caafimaad, barako, farxad iyo cibaado (cf. Matayos. 19:13,15; Markos 10:16)
9. wax la xidhiidha bogsiiin jidh ahaaneed (cf. Matayos. 9:18; Markos 5:23; 6:5; 7:32; 8:23; 16:18; Luukos 4:40; 13:13; Fal 9:17; 28:8)
10. helitaanka Ruuxa Quduuska (cf. Fal 8:17-19; 9:17; 19:6)

Waxa midaysnaan la'aan layaableh oo ku sugan aayadaha taariikh ahaan loo adeegsaday taagerista hoggaamiyayaasha magacaabistooda

1. Fal 6:6 Rasuullada ayaa ah kuwa gacanta saaray toddobada loo magacaabay adeegga
2. Fal 13:3 nebiyada iyo macallimiinta ayaa Barnabas iyo Bawlos gacanta u saaray
3. I Timoteyos. 4:14 odayaasha ayaa ku howlanaa yeedhitaankii Timoteyos
4. II Timoteyos. 1:6 Bawlos ayaa gacanta saaray Timoteyos.

Kala duwanaanshuhu wuxuu tusinaya habaysnaanta oo ku yarayd kaniisaddii ugu horraysay. Kaniisaddii hore waxa ay si joogto ah u adeegsadeen hadiyadaha ruuxiga ah ee rumaystayaasha (I Korintos 14). Axdiga Cusub looma qorin inuu dejiyo sharci ama nidaam xukumi ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 6:7

⁷Markaasaa hadalkii Ilaah faafay, tiradii xertiina Yerusaleem aad ugu badatay, oo tiro badan oo wadaaddo ahina iimaankay yeeleen.

6:7 “hadalkii Ilaah” middani waxay sheegaysaa injiilka Ciise Masiix. Noloshiisa, dhimashadiisa, sarakicistiisa iyo waxbaristiisu waxay ku saabsan yihiin Ilaah iyada oo ka ahaatay jidka cusub ee Axdiga Hore (cf. Matayos. 5:17-48). Ciise waa ereyga (cf. Yooxanaa 1:1; 14:6). Masiixiyadduna waa shakhsi! Eeg fiirada 4:31.

☐ **“faafay”** dhammaanba saddexda fal ee ku sugan aayadda 7 waa falal aan dhammays tirnayn. Waa aragtida udub dhexaadka u ah Falimaha Rasuullada. Ereyga Ilaah waxa uu ku faafayaa oo faafiya dadka ku kalsoon Masiixa waxaanay noqonaysaa qayb ka mida dadka axdiga cusub ee Ilaah (cf. 6:7; 12:24; 19:20). Waxa laga yaabaa middani inay u noqonayso ballan qaadkii Ilaah siiyay Ibraahim oo ku saabsanaa koritaanka qoyskiisa kuwaas oo noqon doona dadka Ilaah ee axdiga hore (cf. 7:17; Bilowgii. 17:4-8; 18:18; 28:3; 35:11).

▣ **“oo tiro badan oo wadaaddo ahina iimaankay yeeleen”** kuwani waxay ka mid ahaayeen hoggaankii Yuhuudda (Sudukiintii) ee ku Masiixiyiinta dhibayay. Kuwa Axdiga Hore sida fiican u yaqaanay waxa si fiican loogu qanciya in Ciisaha reer Naasaret inuu ahaa Masiixii lasii ballan qaaday. Golihii diinta Yuhuuddana dhibaataada ku imanaysay.

Ereyada soo koobitaanka ee ku saabsan koritaanka waxa laga yaabaa inuu muftaaxa u yahay kitaabka (cf. 9:31; 12:24; 16:5; 19:20; 28:31).

▣ **“iimaanka”** ereygan waxa uu la xidhiidhaa arrimo dhowra:

1. Waxa uu la xidhiidhaa asal ahaan Axdiga Hore macnihiisuna yahay “rumaysad yeelasho” ama “kalsooni lahaan” sidaasi darteedna waxa loo adeegsaday rumayashada ama iimaanka aan ku qabno Ilaah (eeg Mawduuca Gaarka ah 6:5).
2. aqbalitaankeena ama qaadashadeenna cafiska Ilaah inagu siiyay Masiixa
3. rumaysad yeelasho ama cibaado yeelasho
4. macnaha uu toosinayo rumaysadka Masiixiyiinta ama caqiidada ku saabsan Ciise (cf. Rooma. 1:5; Galatiya. 1:23; iyo Yuudas 3 & 20).

Ayadado dhowra sida 2 Tesaloniika 3:2 ayaa waxa adaga ujeedada uu Bawlos uuga socday ee maskaxda uu ku hayay. Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:16.

NASB (UPDATED) TEXT: 6:8-15

⁸Markaasaa Istefanos oo ay nimco iyo xoog ka buuxaan ayaa dadka dhexdiisa ku sameeyey yaabab iyo calaamooyin waaweyn. ⁹Laakiin waxaa kacay oo Istefanos la murmay kuwii sunagogga la odhan jiray sunagogga Libertiinta, iyo kan reer Kuranaya, iyo reer Iskanderiya, iyo kuwa Kilikiya iyo Aasiya. ¹⁰Iyaguna waa is-hor taagi kari waayeen xigmaddii iyo Ruuxii uu ku hadlay. ¹¹Markaasay niman laaluusheen, oo nimankii baa waxay yidhaahdeen, Waxaannu maqalnay isagoo Muuse iyo Ilaahba caayaya. ¹²Markaasay kiciyeen dadkii iyo waayeelladii iyo culimadii, oo intay isagii ku soo kediyeen oo qabteen, ayay shirkii geeyeen. ¹³Markaasay waxay soo taageen markhaatiyaal been ah oo leh, Ninkanu iskama daayo inuu meeshan qoduuska ah iyo sharciga erayo xunxun ka sheego, ¹⁴waayo, waxaannu maqalnay isagoo leh, Ciisahan reer Naasaret meeshan buu dumin doonaa, wuxuuna beddeli doonaa caadooyinkii Muuse inooga tegey. ¹⁵Oo kuwii shirka wada fadhiyey oo dhan, iyagoo aad u fiirinaya, waxay arkeen wejigiisii oo ah sidii weji malaa'igeed oo kale.

6:8 “nimco iyo xoog ka buuxaan” “nimco ka buuxdo” waxa ay sheegaysaa barakada Ilaah ee noloshiisa iyo adeegga. Eeg Mawduuca Gaarka ah 5:17. Ereygan “xoog” waxa uu la xidhiidhaa weedha xigta “ku sameeyey yaabab iyo calaamooyin waaweyn.”

▣ **“ku sameeyey yaabab iyo calaamooyin waaweyn”** waa fal aan dhammays tirnayn (sida aayadda 7). Waxa suurto gala in tani ay timid ka hor intii aan loo dooran mid ka mida Toddobada. Farriintii injiilka ee Istefanos waxa ay si joogto ah uula xidhiidhay shakhsiyaddiisa (nimcadu ka buuxdo) iyo awoodda (yaabab iyo calaamooyin).

6:9 “waxa kacay kuwii.” Waxa jirta su'aal la xidhiida sida qof u fasiri karo inta kooxood ee kacdoonka ku samaysay Istefanos.

1. hal sunagoog (niman ka socda dalalka la diiwaan geliyay)
2. labo sunagog
 - a. reer Kuranya iyo Iksandariya
 - b. Yuhuuddii reer Kilikiya iyo Aasiya (Bawlos baa ahaa reer Kilikiya).
3. hal sunagod laakiin ka kooban labo kooxood
4. shan sunagog oo kala duwan.

Ereyga Giriigga ah ee lahaanshuha oo lab jamaca ah (*tōn*) labo jeer ayuu soo noqonayaa.

▣ **“la odhan jiray”** sababta weedhani waa iyada oo ereyga “nin la xoreeyay” ay tahay kelmad Laatiin ah; sidaasi darteedna, waa in loo tarjumo nadiifsanaan. Waxa intaas dheer iyada oo kuwani ay ahaayeen Yuhuud loo qaaday dhul shisheeye addoomo ahaan (milatari ama dhaqaale ahaan), laakiin hadda waxay kusoo laabteen Falastiin iyagoo xor ah, balse luqadoodu ilaa hadda waxay ahayd Koine tii Giriigga.

6:10 farriinta injiilka ee Istefanos may ahayn oo keliya midda ay la socoto awoodda calaamaduhu, laakiin waxa ay ahayd caqli ahaan mid wax qancinaysa. Cutubka 7 ayaa tusaale u ah wacdintiisa.

▣ **“Ruuxii”** qoraalka Giriigga ma samaynayo xarfo waawayn, sidaasi darteedna tani waa fasiraadda tarjumayaasha. Xarafka wayni (R) wuxuu tusinaya Ruuxa Quduuska, laakiin (r) da yari waxay tusinaysaa ruuxa aadanaha (KJV, NRSV fiirada, REB, cf. 7:59; 17:16; 18:25; Rooma. 1:9; 8:16; I Korintos. 2:11; 5:4; 16:18; II Korintos. 2:13; 7:13; 12:18; Galatiya. 6:18; Filiboy. 4:23). Waxa ay middani si dadban u sheegi kartaa Maahmaahyadii. 20:27.

Eeg Mawduuca Gaarka ah: Ruuxa (*pneuma*) 2:2.

6:11 **“Markaasay niman laaluusheen”** ereyga “laaluusheen” waxa uu noqon karaa (1) laaluush siin (cf. Louw iyo Nida, *Lexicon*, vol. 1, pp. 577- 578) ama (2) wax si qarsoodi ah loo fuliyo (cf. Bauer, Arndt, Gingrich, iyo Danker, *A Greek-English Lexicon*, p. 843). Waxay la mid tahay qaabkii loo adeegsaday Ciise (cf. Matayos. 26:61) iyo Bawlos (cf. Fal 21:28). Xukunkooda waxa uu ahaa iyadoo la fawdaynayo Baxniintii 20:7, taasi oo xanbaarsanayd dhimasho.

▣ **“Waxaannu maqalnay isagoo Muuse caayaya”** wacdinta Istefanos ee ku sugan Fal 7 waxa ay ka jawaabaysaa xukunkan. Lama hubo haddii Fal 7 uu ahaa wacdintii intiilka ee Istefanos iyo inuu ahaa wacdin gaara oo loogala jeeday ka jawaabista xukunkan, laakiin waxa hubaala iyadoo Istefanos uu adeegsaday Axdiga Hore si uu u tusiyo Ciise oo ah Masiixa.

▣ **“iyo Ilaahba”** Yuhuuddani waxay Muuse ka horraysiiyeen Ilaah! qaabkoodu waxa uu tusinayaa dhibaataada taagan, waxaana iyaga awood u yeeshay Sharciga Muuse.

6:12 **“waayeelladii iyo culimadii...shirkii”** weedha “waayeelladii iyo culimadii” waxa badanaa uu ahaa qaab loo kala sooco xubnaha Sanhadriinka, kaasi oo sida halkan ka muuqata lagu tilmaamay “Shirka.” Waxa uu ahaa awoodda diimeed ee ummadda Yuhuudda wakhtigii Roomaanka ka hor C.D. 70. Waxa uu ka koobnaa

1. Wadaadka Sare iyo qoyskiisa
2. kuwa hodanka ah ee dhulalka leh iyo hoggaamiyayaasha dadka
3. culimada hoose.

Waxa ay tiradoodu ahayd toddobaatan ka socda agagaarka Yerusaaalem. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Sanhadriinka 4:5.

6:13 **“Ninkanu”** waa qaab semati ah oo tusinaysa necbaansho. Waxa ereyganna in badan loo adeegsaday Ciise.

▣ **“meeshan qoduuska ah iyo sharciga erayo xunxun ka sheego”** weedhani waxay sii fidinaysaa xukunka ku sugan aayadda 11. Waxa laga yaabaa in ay sheegayso Istefanos qiritaankiisii ereyada Ciise ee ku saabsan duminta Macbadka sida ku xusan Luukos 19:44-48 (sido kale Markos 13:2), ama hanjabaaddii Ciise sida ku xusan Matayos. 26:61; 27:40; Markos 14:58; 15:29; Yooxanaa 2:19 (cf. aayadda. 14). Ciise waxa uu naftiisa u arkay inuu yahay “Macbadka cusub,” oo ah xarunta cusub ee cibaadada iyo meesha cusub ee ay ku kulmaan Ilaah iyo aadanuhu (cf. Markos 8:31; 9:31; 10:34). Xukunka Ilaah waxa uu ku imanayay dhismaha Herodos.

Wacdinta Istefanos oo ku saabsanayd cafiska buuxa ee ku sugan Ciise ayaa waxa ay noqotay meesha laga yidhaahdo “sharciguu wax xun ka sheegaa.” Farriinta injiilku waxa ay yaraynasaa ama hoos u dhigaysaa “Axdiga Muuse” iyada oo ka dhigaysa macno markhaati u ah badbaadada (Galatiya 3 iyo kitaabka Axdiga Cusub ee Cibraaniyada).

Marka la eego Yuhuuddii qarnigii ugu horreeyay middani waxay ku ahayd waxbaris xag jir ah, oo ah afagaaddo! Waxa middanina ay kasoo alkunmaysaa fahankii ay ka qabneen Axdiga Hore ee ahaa tawxiidka,

badbaadada, iyo Ilaah oo Israa'iil gaar ku ah. Axdiga Cusubi waxa uu barayaa diiradda oo meel kale loo jeediyo (Ciise ee maaha Israa'iil, nimcada oon ahayn dabaqyada aadanaha).

6:14 dhinac marka laga eego xukunkooda wuxuu ahaa run! Labadan xukun waxa ay ka yimaaddeen oo keenay Sudukiinta (“baabi’i meeshan”) iyo Farrisiinta (beddel caadooyinka Muuse keenay).

▣ **“Ciisahan reer Naasaret”** eeg Mawduuca Gaarka ah 2:22.

6:15 “iyagoo aad u fiirinaya” waa qaab suugaan ahaaneed oo uu adeegsanayo Luukos. Waxa uu faa’idaynayaa ama tusinayaa yool saaris iyadoon wax kale loo jeedin (cf. Luukos 4:20; 22:56; Fal 1:10; 3:4,12; 6:15; 7:55; 10:4; 11:6; 13:9; 14:9; 23:1).

▣ **“wejigiisii oo ah sidii weji malaa'igeed oo kale”** waxa ay tani la mid noqon kartaa

1. wejigii Muuse oo iftiimay markuu la kulmayo YHWH (cf. Baxniintii. 34:29-35, II Korintos. 3:7)
2. Ciise wejigiisa iyo jidhkiisa oo iftiimay markii isbeddelkiisa (cf. Matayos. 17:2; Luukos 9:29)
3. rasuulkii malagga ahaa ee Daanyeel 10:5-6

Waxa middani ay shabbahaad u tahay qofka ku sugan joogitaanka Ilaah.

SU’AALO FALQAYN AH.

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay kaniisaddii ugu horreysay kuwa xagga ruuxa ugu xooggan ugu adeegsatay inay ka adeegaan miisaska?
2. Maxaa loo dareensanaa koritaanka saa’idka ah?
3. Maxay tahay ujeeddada gacan saaristu?
4. Maxaa Istefanos loo weeraray?

FALIMAHA RASUULLADA 7

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Hadalladii Istefanos	Khudbaddii Istefanos: u yeedhitaankii Ibraahim	Wacintii iyo shahiiditaankii Istefanos (6:8-8:1a)	Hadalkii Istefanos	Hadalkii Istefanos
7:1-8	7:1-8		7:1 7:2-8	7:1-8
	Wadaaddaii Masar dhexdeeda	7:2b-8		
7:9-16	7:9-16	7:9-16	7:9-16	7:9-16
7:17-22	7:17-36	7:17-22	7:17-22	7:17-22
7:23-29		7:23-29	7:23-29	7:23-29
7:30-43	I	7:30-34 7:35-43	7:30-34 7:35-43	7:30-34 7:35-43
	sraa'iil oo ku caasiyoobay Ilaah 7:37-43			
	Waabka runta ah ee Ilaah		7:39-43	
7:44-50	7:44-50	7:44-50	7:44-47 7:48-50	7:44-50
	Reer bani Israa'iil oo hor istaagay Ruuxa Quduuska ah			
7:51-53	7:51-53	7:51-53	7:51-53	7:51-53
Dhagxintii Istefanos	Shahiidkii Istefanos		Dhagxintii Istefanos	Dhagxintii Istefanos, Sawlos oo silciye ah
7:54-8:1a	7:54-60	7:54-8:1a	7:54-8:1a	7:54-8:1

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Hadalka Istefanos ee ku sugan Fal 7 waa ka uugu dheer Falimaha Rasuullada. Waxa ay ka hadlayaa fiqiga asaas ahaaneed ee Bawlos (iyo kaniisadda) ee ah fahanka xidhiidhka uu injiilku la leeyahay Axdiga Hore. Wacdinta Istefanos waxa ay ka jawaabaysaa xukunka isaga lagu sameeyay isagoo tusinaya in
 1. Ilaah uu shuqulo ku sameeyay Macbadka dibaddiisa
 2. Ilaah waxa uu la shaqeeyaa kuwa aan ahayn Yuhuudda
 3. Yuhuuddu hadiyo goor waxay diideen farriinta Ilaah, dadka, iminkana waxay diideen Masiixa!
- B. Istefanos is difaaciisu waxa uu saameeyay Saul kii reer Tarsus qalbigiisa iyo fiqiga Bawlos.
- C. Istefanos waxa uu muujinayaa axdiga sii socda ee dadka Yuhuudda iyo muujinta Ilaah ee ka baxsan Dhulka Ballan qaadka ee ka gaarka ah Macbadka ku yaalla Yerusaaalem, kaasi oo ay diiradda saarayeen Yuhuuddii qarnigii ugu horreysay caabudaaddoodu.
- D. Dadka Yuhuuddu waxay si joogto ah u diideen afhayeenka Ilaah oo haddana mar labaad ayay middaa sameeyeen. Waxa ay diideen Ciisihii reer Naaseret waxaanay diideen sidoo kale Istefanos oo ah Markhaatigiisa.
- E. Istefanos waxa lagu xukumay xukun la mida inuu sameeyay aflagaado sidii Ciiseba loogu eedeeyay. Iyadoo la dhagxinayo ayaa Istefanos waxa uu yidhi waxyaalo shabahaya ereyadii Ciise markuu saarnaa isku tallaabta. Tani haddaba ma mid uu Luukos ujeedadeeda u socdaa? Waxay u muuqataa sidaas!
- F. Istefanos halka uu ka taagan yahay xidhiidhka u dhexeeya Yuhuudda iyo Masiixiyiinta waxa uu dejinayaa oo kenayaa silcinta (8:1-3) waana kala qaybinta (C.D. 70 habaarkii) labadan kooxood. Waxa suurto gala in Ilaah uu Istefanos adeegsaday, siduu Axdiga Horeba ugu adeegsaday Samson bilaabitaanka loollan sababaha in injiilku uu ku faafo Falastiin dibaddeeda.
- G. Istefanos hadalkiisu ama wacdintiisu waxay wadataa faahfaahin ka duwan Cibraaniyada Axdiga Hore (xigashooyinka ka ahaaday Sebtuujantiga). Culimmadu ma isku dayi doonaan inay difaacaan Istefanos hadalkiisa ama ma waxay ka dhigi doonaan dhaqan Yuhuudeed ama xitaa taariikh khaldan? Tani waxa ay muujinaysaa caadifadda iyo caqliga mufasiriinta. Waxaan rumaysanahay in Kitaabku yahay taariikh sax ah iyadoo Masiixiyadduna ku taagan ama ku dhacaysa dhacdooyinka ku sugan Kitaabka. Si kastaba ha ahaatee, bilowga ugu horreeya ee Kitaabku (Bilowgii 1-11) iyo dhammaadka Kitaabku (kitaabka Muujintii) maaha “nooc taariikh”! Sida ay tusinayaan dhacdooyinka fara gelintu waxa aan u malaynayaa in ay yihiin kuwo saxa oo runa. Tani waxay diiwaanka mararka qaar u qaadaysaa in ay jiraan:
 1. kala duwanaansho xagga tirada ah
 2. kala duwanaansho xagga nooca ah

3. kala duwanaansho faahfaahinta ah

4. qaababka rabbiyiinta ee fasiraadda (ex. Isku xidhka labo ama wax ka badan oo qoraal ah).

Tani saamayn mayso qiritaankayga waxyaalaha taariikhda kusoo arooray ama runtooda ah qisooyinka kitaabiga ah. Istefanos waxa laga yaabaa inuu dib u tirinayay waxa uu ka bartay Sunoogga dugsigiisa ama waxa uu bedelitaan ku sameeyay qoraallada si uu ugu saleeyo ujeeddadiisa! Taariikhda oo uu ka tago isaga oo diiradda saaraya mid ama labo faahfaahina waxa ay tusinaysaa macnaha casrigeenna ee taariikh ahaaneed mana aha macnaha qarnigii ugu horreeyay taariikhda.

H. Kormarka asaasiga u ah Istefanos oo kormaris taariikh ahaaneed ku samaynaya Ilaah iyo Israa'iil ee cutubka 7

1. wadaaddadii sare, aayadaha. 2-16

2. Baxniintii iyo ku sugnaantii duurka, aayadaha. 17-43

3. Waababka iyo Macbadka, aayadaha. 44-50

4. iyaga oo lagu dabaqayo soo koobitaankiisa taarkhka Axdiga Hore aayadaha. 51-53

I. Istefanos wuxuu adeegsanayaa maraajic badan oo Axdiga Hore ah (xigashooyin iyo hadallo dadban).

1. 7:3 – Bilowgii. 12:1

2. 7:5 – Bilowgii. 12:7 ama 17:8

3. 7:6-7a – Bilowgii. 15:13-14

4. 7:7b – Baxniintii. 3:12

5. 7:8a – Bilowgii. 17:9-14

6. 7:8b – Bilowgii. 21:2-4

7. 7:8c – Bilowgii. 25:26

8. 7:8d – Bilowgii. 35:22-26

9. 7:9 – Bilowgii. 37:10,28; 45:4

10. 7:10 – Bilowgii. 39:21; 41:40-46

11. 7:11 – Bilowgii. 41:54-55; 42:5

120

12. 7:12 – Bilowgii. 42:2

13. 7:13 – Bilowgii. 45:1-4

14. 7:14 – Bilowgii. 45:9-10

15. 7:15 – Bilowgii. 46:5; 49:33; Baxniintii. 1:6

16. 7:16 – Bilowgii. 23:16; 50:13

17. 7:17 – Baxniintii. 1:7-8

18. 7:18 – Baxniintii. 1:8

19. 7:19 – Baxniintii. 1:10-11

20. 7:20 – Baxniintii. 2:2

21. 7:21 – Baxniintii. 2:5,6,10

22. 7:22 – Baxniintii. 2:10

23. 7:23 – Baxniintii. 2:11-12

24. 7:26 – Baxniintii. 2:13

25. 7:27-28 – Baxniintii. 2:14

26. 7:30 – Baxniintii. 3:1-2

27. 7:29a – Baxniintii. 2:15

28. 7:29b – Baxniintii. 2:22; 4:20; 18:3-4

29. 7:32 – Baxniintii. 3:6

30. 7:33-34 – Baxniintii. 3:5,7-10

31. 7:36 – Baxniintii. 12:41; 33:1

32. 7:37 – Deut. 18:15

33. 7:38 – Baxniintii. 19:17

34. 7:39 – Num. 14:3-4

35. 7:40 – Baxniintii. 32:1,2,3

36. 7:41 – Baxniintii. 32:4,6

- 37. 7:42-43 – Amos 5:25-27
- 38. 7:44 – Baxniintii. 25:31,36-40
- 39. 7:45 – Yashuuca. 3:14ff; 18:1; 23:9
- 40. 7:46 – II Samuu’eel. 7:8ff
- 41. 7:47 – I Boqorradii 6-8; II Taariikhadii 1-6
- 42. 7:49-50 – Ishacyaah. 66:1-2

Soo koobitaan kale oo ah Qorniinka taariikhda Israa’iil waa Nexemyaah 9.

- 1. 9:6 – Bilowgii 1-11
- 2. 9:7-8 – Bilowgii 12-50
- 3. 9:9-14 – Baxniintii (baxniintii)
- 4. 9:15-21 – Tirintii (the wilderness wandering period)
- 5. 9:22-25 – Yashuuca (qabsashadii)
- 6. 9:26-31 – Xaakinnadii
- 7. 9:32-38 – Samuu’eel, Boqorradii, Taariikhadii (xukunkii)

NASB (UPDATED) TEXT: 7:1-8

¹Markaasaa wadaadkii sare wuxuu yidhi, Waxanu ma saasaa? ²Markaasuu ku yidhi, Walaalo iyo aabbayaalow, dhegaysta, Ilaaha Ammaantu wuxuu u muuqday awoweheen Ibraahim markuu Mesobotamiya joogay intuusan Haaraan degin, ³oo wuxuu ku yidhi, Ka soo kac waddankaaga iyo dadkaaga, oo kaalay dalka aan ku tusi doono. ⁴Markaasuu ka soo kacay dalkii reer Kaldayiin oo wuxuu soo degay Haaraan; oo markuu aabbihiis dhintay ayaa Ilaah meeshaas isaga ka soo wareejiyey oo keenay dalkan aad haatan deggan tihiin, ⁵oo dhaxalna kama uu siin, xataa meel uu cagtiisa dhigo; laakiin wuxuu isaga ka ballan qaaday inuu dalka mulki u siiyo isaga iyo farcankiisa ka dambeeyaba, in kastoo uusan dhal lahayn. ⁶Ilaah sidan buu u hadlay, in farcankiisu degi doono dal shisheeye, oo iyaga la addoonsan doono, oo afar boqol oo sannadood la dhibi doono. ⁷Ilaah wuxuu yidhi, Quruunta iyagu ay u addoonsamaan ayaan xukumi doonaa; markaas dabadeed ayay ka soo bixi doonaan oo meeshan iigu adeegi doonaan. ⁸Oo wuxuu isaga siiyey axdiga gudniinta; haddaba Ibraahim wuxuu dhalay Isxaaq, oo maalintii siddeedaad ayuu guday isaga; Isxaaqna wuxuu dhalay Yacquub; Yacquubna wuxuu dhalay laba-iyto-tobankii aynu ka soo farcannay.

7:1 “wadaadkii sare” kani wuxuu ahaa Kayefas. Eeg fiirada 4:6.

7:2 “wuxuu yidhi” is difaacitaanka Istefanos waxa uu aad ugu eegyahay kitaabka Cibraaniyada. Xukunka waxa uu uga jawaabayaa labo siyaabood: (1) dadka Yuhuuddu waxay si joogto ah u diideen Muuse wakhtigii hore iyo (2) Macbadka waxa uu ahaa mid ka mida siyaabo dhowra oo Ilaah u adeegsaday inuu kula hadlo dadka Israa’iil. Tani waxa ay jawaab toosa u tahay xukunka lagu eedeeyey sida ku sugan 6:13.

☐ **“dhegaysta”** kani waa fal amar ah oo ka ahaadey ereyga Giriigga ah ee *akouo*. Waxa lagu dhex adeegsaday Sabtuujantiga iyadoo la tarjumaya salaadda caanka ah ee diinta Yuhuudda, *Shema* (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 6:4-5). Sidoo kale waxa loo adeegsaday nebiyada si looga tarjumo dareenka “dhegeysta idinkoo ka jawaabaya” (cf. Miikaah 1:2; 6:1). Waxa adag in qaabkan isla xidhiidhinta ahi uu jiray marka kuwan Yuhuudda ahi ay fikirhooda ku dhiibanayeen luqada Giriigga, laakiin meelaha qaarkood oo ay sidan tahay waxay noqon karaa run.

☐ **“Ilaaha Ammaantu”** Ilaaha ammaantu (cf. Sabuurka. 29:3) wuxuu u muuqday Ibraahim (cf. Bilowgii. 12:1, 15:1,4; 17:1; 18:1, 22:1), bilowgii dadka Yuhuudda. Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:13.

☐ **“Ibraahim”** Ibraahim waxa uu ahaa Aabbaha dadka Yuhuudda. Waxa uu ahaa wadaadkii ugu horreeyay, sida yeedhitaankiisa iyo la socoshadiisa Ilaah ahaydna waxa lagu sheegay Bilowgii 12:1-25:11. Galatiya 3 iyo mar kale Rooma 4 Bawlos waxa uu u adeegsanayaa ku badbaadida ama xaq ku noqoshada rumaysadka.

▣ **“markuu Mesobotamiya joogay intuusan Haaraan degin”** Bilowgii 11:31 ayaa sheegaysa in Ibraahim uu ku sugnaa Haaraan markii YHWH isaga uu la hadlay. Si kastaba ha ahaatee, wakhtii Ilaah uu la xidhiidhay Ibraahim si gaar ah looma sheegin. Ibraahim waxa uu kasoo jeeday Uur tii Kaldayiin (cf. Bilowgii. 11:28,31), Laakiin mardanbe ayuu u guuray Haaraan (cf. Bilowgii. 11:31,32; 29:4) isagoo addeecaya amarka Ilaah. muhiimaddu waxay tahay Ilaah oo Ibraahim kula hadlay meel ka baxsan Kancaan. Ibraahim muu lahayn qayb ka mida Dhulka Quduuska ah (aayadda 5) intii uu noolaa (marka laga reebo xabaal lagu aaso qoyskiisa, Bilowgii 23:9).

Ereyga ah “Mesobotamiya” waxa uu tilmaami karaa quruumaha kala duwan:

1. dadkii deganaa agagaaraha woqiiyaga Dajla iyo Furaat (“Siiriya inta u dhaxaysa labada webi”)
2. dadkii u dhowaa afka Dejla iyo Furaat.

▣ **7:3 “Ka soo kac waddankaaga iyo dadkaaga, oo kaalay dalka aan ku tusi doono”** waa xigasho ka ahaatay Bilowgii 12:1. Arrinta fiqi ahaaneed ee xigashadani ay koobsanaysaa waxa weeyi goorta uu Ilaah ku yidhi sidan Ibraahim:

1. markii uu ku sugnaa Uur ka hor intii aanu aabbihii Terah iyo wiilkii adeerka u ahaa aanu u qaadin Haaraan.
2. markii uu joogay Haaraan waxa uu sugay intii ilaa intii aabbihii ka dhimanayay si uu Ilaah ugu raaco koonfurta Kancaan?

7:4 “Markaasuu ka soo kacay dalkii reer Kaldayiin” Kaldaya (BDB 505) waxa laga yaabaa inay ahayd degmo u dhowayd halka uu ku dhammaado webiga Dajla iyo Furaat (eeg fiirada 7:2). Mardanbana waxa lagu sheegay dadkii ka yimid gobolkan sidoo kalena waxa loo yaqaanay Baabiloon (BDB 93). Ummadani sidoo kale waxa ay soo saareen culimmo badan oo horumariyay xisaabaadka la xidhiidha iftiinnada habeenka (meerayaasha, xiddigaha iwm.) kooxdan xikmadda lihi (xiddigiyayaashu) sidoo kale waxa lagu magacaabi jiray Kaldayiin (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 2:2; 4:7; 5:7-11).

▣ **“Haaraan”** Haaraan (BDB 357) waa magaaladii ay Teeraah, Ibraahim iyo Luut u guureen (cf. Bilowgii. 11:31-32). Magaaladani waxay ku taallan qaybta hoose ee Furaat (dooxada Balikh) waxaanay bilaabantay kumaadkii saddexaad C.H. waxaanay magaceeda haysataa ilaa maanta. Waxa loo fiirsan karaa oo xiiso leh, Ibraahim walaalkiis, Haaraan (BDB 248), oo xagga Cibraaniga aan isku si loola qorin magaalada.

▣ **“markuu aabbihiis dhintay”** kuwo badan ayaa halkan u arka inuu jiro iska hor imaad u dhexeeya Bilowgii. 11:26,32 iyo 12:4. Waxa haddaba jira ugu yaraan labo xal.

1. Ibraahim waxa laga yaabaa inaanu ahayn wiilka ugu wayn, laakiin uu ahaa wiilka ugu caansan (ka ugu horreeya lagu xisaabiyay).
2. Shanta kitaab ee ugu horreeya Samaariyiinta kitaabkoodu waxa uu dhigayaa inuu Teeraah dhintay isagoo ah 145 jir, sida qoraalka Cibraaniga. Eeg Gleason L. Archer, *Encyclopedia of Bible Difficulties*, p. 378.

7:5 “wuxuu isaga ka ballan qaaday inuu dalka mulki u siiyo isaga iyo farcankiisa ka dambeeyaba” waxa middani ay u noqonaysaa Bilowgii. 12:7 ama 17:8. Muftaaxa fiqi ahaaneed maaha ballan qaadka Ilaah oo keliya, laakiin Ibraahim rumaysadkiisa ayaa siinaya farcankiisa dhulka. Rumaysadkan waxa lagaga hadlay Bilowgii. 15:6 (cf. Galatiya. 3:6; Rooma 4:3).

7:6 waxsii sheegiddan waxa lagu sheegay Bilowgii 15:13,14 waxaana markale lagu sheegay Baxniintii 3:12. Si kastaba ha ahaatee, Baxniintii 12:40 waxay dhigaysaa “430 sano” halkii ay ka dhigi lahayd “400 sano.” Sebteuujantigu (LXX) Baxniintii 12:40 wuxuu u tarjumayaa “Reer binu Israa’iil intay dalka Masar qariib ku ahaayeen waxay ahayd afar boqol iyo soddon sannadood.”

Rabbaaniyuuntu waxay sheegeen in tirada “400 sano” ay ka bilaabmayso markii Isxaaq qurbaan ahaanta loo bixin rabay sida ku sugan Bilowgii 22. John Calvin 400 sano waxa uu ugu yeedhay tirada wareegsan. Waxa ay la xidhiidhi kartaa afar fac oo mid kastaa yahay 100 sano (Bilowgii 15:16).

7:7 “**Quruunta iyagu**” tani waa xigasho ka ahaatay Sabtuujantiga Bilowgii 15:14. Middan loogalama jeedo fahan yaraan, laakiin waa hadal guud ahaaneed. Quruuntaasi waxa ay ahayd Masar. Quruumaha kalena, siday doontaba ha noqotee (Filistiin, Siiriya, Assuriya, Baabiloon), waxay noqon doonaan kuwo kasoo horjeeda Israa’iil kaddibna Ilaah iyaga wuu xukumi doonay.

▣ “**markaas dabadeed**” weedhani waxa weeyi xigasho ka ahaatay Baxniintii 3:12, Istefanosna waxa uu dib u raacayaa taariikhda Israa’iil. qoraalkani waxa uu sheegayaa in Kancaan iyo Yerusaaalem ay noqon doonaan meesha u gaarka ah YHWH. Waxa ay waafaqaysaa sida ku sugan Sharciga Kunoqoshadiisa.

▣ “**oo meeshan**” macnaha ay tusinayso xigashada ka ahaatay Baxniintii 3:12, waxa ay sheegaysaa iyadoo tani tilmaamaysa Buur Siinay (eeg Mawduuca Gaarka ah 7:30), taasi oo ka baxsan dhulka Ballan qaadka isla markaasna ah dhacdooyinka ugu badan nolosha Israa’iil meesha ugu muhiimsanayd (sharci siinta Muuse).

7:8 “**axdiga**” eeg Mawduuca gaarka ah 2:47.

▣ “**gudniinta**” middan waxa sameeyay dhammaanba kuwii la jaarka ahaa Israa’iil, marka laga reebo Falastiiniyiinta (dadkii Giriigga Aegiyaanka ahaa). Dhaqamada badankooda waxay u ahayd calaamad aadanaha oo dhan u ahaaday, oon u ahaanin oo keliya Israa’iil, halkaasoo ay calaamad ugu ahayd dadka axdiga. Waxa ay calaamad u ahayd xidhiidhka rumaysadka ah ee gaarka u ah YHWH (cf. Bilowgii. 17:9-14). Wadaad kastaa waxa uu guday inamadiisa ama wiilashiisa (waxa uu qoyskiisa u ahaa wadaad). Robert Girdlestone, kitaabkiisa *Synonyms of the Old Testament*, p. 214, waxa uu ku sheegayaa in calaamadda gudniinku ay la xidhiidhay dhiig daadin oo ah falka gudniinka. Dhiigga waxa uu la xidhiidhay axdiga (cf. Bilowgii. 15:17), jebinta axdiga (cf. Bilowgii. 2:17), iyo axdiga badbaadada (Ishacyaah 53).

▣ “**laba-iyo-tobankii aynu ka soo farcannay**” middani waxa ay tilmaamaysaa Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub, Laakiin halkan waxa ay ku sheegaysaa Yacquub labo iyo tobankiisii wiil, kuwaasi oo noqon doonay qabiillada Israa’iil.

NASB (UPDATED) TEXT: 7:9-10

⁹Kuwii aan ka soo farcannayna intay Yuusuf ka masayreen ayay waxay ka iibiyeen Masar; ¹⁰laakiin Ilaah baa isaga la jiray oo dhibaatiisii oo dhan ka samata bixiyey, oo axsaan iyo xigmad ka siiyey Fircoon, oo ahaa boqorkii Masar; markaasuu isaguna wuxuu isagii taliye uga dhigay Masar iyo reerkiisii oo dhan.

7:9 “**Yuusuf**” middan waxa laga helayaa Bilowgii 37:11,28; 45:4. Istefanos waxa uu isku dayayaa inuu muujiyo in dadka Yuhuudda iyo hoggaamiyayaashoodu ay in badan diideen hoggaamiyaha Ilaah doortay (cf. Muuse, aayadda. 35).

7:10 middani waxay ku sugan tahay Bilowgii. 39:21; 41:40-46.

7:11 waxa middani ay ku sugan tahay Bilowgii. 41:54-55; 42:5.

NASB (UPDATED) TEXT: 7:11-16

¹¹Haddaba waxaa Masar iyo Kancaan oo dhan ka wada dhacay abaar iyo dhibaato weyn; awowayaasheenna dhuuni bay ka waayeen. ¹²laakiin markii Yacquub maqlay in Masar sarreen jiro, ayuu markii ugu horraysay awowayaasheen diray. ¹³Oo markii labaad waxaa walaalihiis la aqoonsiiyey Yuusuf; markaasaa Fircoon wuxuu gartay Yuusuf qoladiisii. ¹⁴Markaasaa Yuusuf cid u diray oo u Yeedhay aabbihiis Yacquub iyo dadkiisii oo dhan oo ahaa shan iyo toddobaatan qof, ¹⁵Markaasaa Yacquub Masar tegey. Isaga qudhiisii waa dhintay iyo awowayaasheenba; ¹⁶waxaana la geeyey Shekem oo la dhigay xabaashii Ibraahim qiimaha lacagta ah kaga iibsaday wiilashii Xamoor oo Shekem joogay.

7:12 waxa middani ay ku sugan tahay Bilowgii. 42:4.

7:13 waxa middani ay ku sugan tahay Bilowgii. 45:1-4.

7:14 “**shan iyo toddobaatan**” tani waxa ay waafaqsan tahay Sabtuujantiga iyo Qoraallada laga helay Badda Dhimatay, halka Qoraalka Masoorigu uu ka dhigayo “toddobaatan” (cf. Bilowgii. 46:27; Baxniintii. 1:5; Sharciga Kunoqoshadiisa. 10:22). Ugu horrayn tani waxay u muuqataa dhibaato qoraal gacmeedka ah oo u dhaxaysa LXX ka, taasi oo Istefanos uu soo xiganaya, iyo qoraalka Cibraaniga ee Baxniintii 1:5. Ka tarjumaadda dheeraadka ah waxay u muuqan kartaa sii socoshada dhammaanba farcanka Yacquub. Dhibaataaduna waxay ka dhex aloosmaysaa Bilowgii 46:26 iyo 27:

1. MT ga aayadda 27 waxa uu dhigayaa laba wiil oo Yuusuf uugu dhashay Masar, halka LXX ku uu ka dhigayo sagaal, taasi oo macneheedu yahay Efrayim iyo Manasah ay mar danbe ku heleen carruur badan.
2. qoraalka Cibraaniga ah Yacquub iyo naagtiisa waa lagu diiwaan geliyay, laakiin Efraayim iyo Manasaah carruurtdooda dheeraadka ah laguma diiwaan gelinin.

Qoraalka Giriigga (LXX) Yacquub iyo naagtiisa laguma diiwaan gelinin, laakiin carruurta dheeraadka ah ee Efrim iyo Manasah ayaa lagu diiwaan geliyay. Labaduba waa sax, laakiin farcanka siyaabo kala duwan ayay ugu sheegayaan nolosha Yacquub. Qoraallada Cibraaniga ee loo yaqaano Qoraallada Badda Dhimatay sidoo kale waxay dhigayaan “shan iyo toddobaatan qof” Bilowgii 46:27 iyo Baxniintii 1:5. Philo gii reer Iksandariya ayaa garanayay labada tiroba.

Dhammaanteen waxa aan ka faa’idaysanaynaa waxbarashada casriga ah marka ay u timaaddo qoraallada adag ama dhibaatooyinka ka yimaadda tirada sida tan oo kale. waxa jira nooc cusub oo ah ilaha kitaabiga ah isla markaana muhiimadda siiya qoraalladan adaygga badan. Waxa aan ku talinayaa kitaabbada:

1. *Hard Sayings of the Bible*, IVP
2. *More Hard Sayings of the Bible*, IVP
3. *Encyclopedia of Bible Difficulties* by Gleason Archer.

Wixii falaqayna ee dheeraada kuna saabsan Fal 7:14-15 eeg #1 pp. 521-522.

7:15 waxay middani ku diiwaan gashantahay Bilowgii. 46:5; 49:33; Baxniintii. 1:6.

7:16 “**Shekem**” diiwaannada ku sugan Bilowgii waxa ka ahaaday (1) aasitaankii Yuusuf oo ku sugan Yashuuca 24:32 iyo (2) aasitaanka Yacquub oo ku diiwaan gashan Bilowgii. 50:13, halkaana waxay ugu muuqataa inay kaga duwan tahay wacdinta Istefanos. Dhibaataadu waxa weeyi (1) magaaladu; waa inay noqoto Xebron, oon ahayn Shekem, ama (2) wadaadka; waa inuu noqdo Yacquub, oon ahayn Ibraahim. Si kastaba ha ahaatee, Ibaarhim iyo Yacquub labaduba dhul bay iibsadeen (cf. Bilowgii. 23:16; 33:19). Xerbron ayaa Saaray iyo Ibraahim lagu aasay (cf. Bilowgii. 23:19; 25:9), sidoo kalena Isxaaq iyo Rebeqah (cf. Bilowgii. 49:29-31) iyo Yacquub (cf. Bilowgii. 50:13). Inkasta oon la hubin xabaasha aasitaanka ee Shekem, waxa suurto gala in Ibraahim uu mar hore iibsaday beer markii uu ku hakaday halkaas sida ku sugan Bilowgii. 12:6-7. Mardanbe ayaa haddana Yacquub uu dhulkan uu xawilay (cf. Bilowgii. 33:19; Yashuuca. 24:32). Tani waa male, laakiin Istefanos wuxuu u muuqdaa mid aqoon badan u leh taariikhda Axdiga Hore tanina waxay noqonaysaa midda keliya ee heshiisiin karta waxyaalaha diiwaan gashan ee kala duwan.

NASB (UPDATED) TEXT: 7:17-29

¹⁷laakiin markuu soo dhowaaday wakhtigii ballankii Ilaah kula ballamay Ibraahim, ayay dadkii ku soo kordheen oo ku bateen Masar, ¹⁸tan iyo intii boqor kale oo aan Yuusuf oqooni Masar ka kacay. **19** Isaguna waa khiyaaneeyey dadkeenna, awowayaasheenna wuu xumeeyey, oo wuxuuna ku qasbay inay ilmahoodii yaryaraa iska tuuraan si ayan u sii noolaan. ²⁰Muusena wakhtigaasuu dhashay, oo wuxuu ahaa wax qurux badan; oo saddex bilood ayaa gurigii aabbihis lagu hayay; ²¹markii la tuurayna, Fircoon gabadhiisii ayaa qaadatay oo sidii wiilkeedii oo kale u korsatay. ²²Muusena waxaa la baray xigmaddii Masriyiinta oo dhan; hadalladiisa iyo falimihisana xoog buu ku lahaa. ²³laakiin markuu gaadhay afartan sannadood oo buuxa ayaa waxaa qalbigiisa gashay inuu walaalihis oo reer bini

Israa'iil ahaa soo booqdo. ²⁴Oo markuu arkay midkood oo lagu gardarroonayo, ayuu ka celiyey, oo intuu kii la dulmayay uu aarguday, ayuu Masrigii dilay; ²⁵oo wuxuu u malaynayay in walaalihiis garteen sida Ilaah gacantiisa iyaga ugu samata bixinayo, laakiin ma ay garan. ²⁶Oo maalintii ku xigtay ayuu iyagoo diriraya u yimi, oo wuxuu damcay inuu heshiisiyo, markaasuu yidhi, Niman yahow, walaalaad tihiine; maxaad isu dulmaysaan? ²⁷laakiin kii deriskiisii dulmayay, ayaa isaga iska riixay oo ku yidhi, Yaa nooga kaa dhigay taliye iyo xaakin? ²⁸Ma waxaad doonaysaa inaad ii dishid sidaad Masrigii shalay u dishay? ²⁹Markaasaa Muuse hadalkaas aawadiis cararay, oo sidii ajanabi buu dalka Midyaan u degganaa, meeshaasna laba wiil buu ku dhalay.

7:17 tani waxay sheegaysaa Bilowgii. 15:12-16 (ballanta) iyo Baxniintii. 1:7 (tiradooda wayn).

7:18 “tan iyo intii boqor kale ka kacay” waa xigasho ka ahaatay Baxniintii 1:8. Waxa jirta dood culimada dhex taalla oo ku waajahan maalinta Baxniintii. Aqoonsashada boqorkan Masaariga ahi waa mid aan la isku waafaqsanayn. Qaar waxay ku tilmaameen boqor Masri ah qoyskii XVIII (1445 C.H.) ama qoyskii XIX (1290 C.H.). aragti ayaa waxy la xidhiidhaa boqorkii Masriga ahaa ee qoyskii ugu horreeyay Masaarida kaasoo ka takhalusay xaakinnadii Hyksos ee Masar. Tani waxay sharraxaysaa adeegsiga *heteros* ee aayadda 18. Ninkan Masriga ahu muu rabin semetiga dadka ah sida Cibraaniyada oo ku bata dhulkiisa, waxaanu ka cabsi qabay duullimaad kale oo la mida kii Hyksos ka.

MAWDUUC GAAR AH: MAALINTA BAXNIINTII

A. Waxa jiray labo fikiradood oo culimada ka kala qabeen maalinta Baxniintii:

1. ku sugan I Boqorradaii 6:1, taasoo odhanaysa, “Oo Sulaymaan wuxuu bilaabay inuu gurigii Rabbiga dhiso markay ahayd afar boqol iyo siddeetan sannadood”:
 - a. Sulumaymaan xukunkiisa wuxuu bilaabay 970 C.H. tanna waxa lagu calaamadeeyay dagaalkii *Qarqar* (853 C.H.) oo ah taariikh la hubo.
 - b. Macbadka waxa la dhisay sanadkiisii afraad (965 C.H.), Baxniintuna waxay soo aroortay ku dhowaad 1445/6 C.H.
2. Tani waxay ka dhigaysaa inay dhacday qoyskii 18aad ee Masaarida.
 - a. Fircoon iyo kaso horjeedsigii wuxuu noqonayaa *Thutmose III* (1490-1436 C.H.).
 - b. Fircoonka Baxniintii waxa uu noqonayaa *Amenhotep II* (1436-1407 C.H.).
 - (1) qaar ayaa rumaysan daliilka ka ahaaday Jeriko oo ku salaysan xaqiiqada aan dhexdhexaadka ahayn ee kusoo dhex aroortay Jeriko iyo Masar xilligii xukunkii *Amenhotep III* (1413-1377 C.H.).
 - (2) qoraallada *Amarna* t waxay qorayaan werin dhex dhexaada oo ku qoran wax ku saabsan *Habiru* oo ka ordaya dhulka Kacnaan xilligii xukunkii *Amenhotep III*. Sidaasi darteedna, Baxniintu waxay ahayd xilligii xukunkii *Amenhotep II*.
 - (3) xilligii Xaakinnadu ma badna haddii qarnigii 13 aad uu yahay taariikhda Baxniintii.
3. Dhibaatooyinka suurto galka ah ee taariikhahani waa:
 - a. Sabtuujantiga (LXX) oo dhigaya 440 sano oon ahayn 480.
 - b. waxa suurto gala in 480 sano ay u dhigmaan 12 fac oo midkiinba yahay 40 sano, sidaasi darteedna, uu yahay nambor tusaale ah.
 - c. waxa jira 12 fac oo ah wadaaddo kanasoo bilaabmay Haaruun ilaa Sulaymaan (cf. I Taariikhdii 6), kaddibna 12 ka bilabmaya Sulaymaan ilaa Macbadka Labaad. Yuhuuddu sida Giriigta oo kale, faca waxay ku qiyaasheen afartan sano, sidaasi darteedna waxa jira 480 sanadood oo hore iyo dib u noqonaya (adeegsiga calaamadaha tirada, cf. Bimson’s *Redating the Baxniintiius and Conquest*).
4. waxa kaloo jira saddex qoraal oo kale isla markaana sheegaya taariikhaha:

- a. Bilowgii 15:13,16 (cf. Acts 7:6), 400 sanadood
 - b. Baxniintii 12:40-41 (cf. Galatiya. 3:17)
 - (1) MT – 430 sano Masar dhexdeeda
 - (2) LXX – 215 sano Masar dhexdeeda
 - c. Xaakinnadii 11:26 – 300 sano oo u dhexaysay wakhtigii Jeftaah iyo qabsashadii (taageeraysa taariikhda 1445)
 - d. Fal 13:19, baxniin, yaabab iyo qabsasho– 450 sano
5. qoraaga Boqorrada wuxuu adeegsaday maraajic taariikheed oo gaara oo ku wareegayn tirooyinka (Edwin Thiele, *A Chronology of the Hebrew Kings*, pp. 83-85.
- B. Daliillada taariikh ahaaneed waxay u muuqdaan inay tilmaamayaan taariikhda 1290 C.H., ama qoyskii 19 aad ee Masaarida.
1. Yuusuf wuxuu awoodayay inuu booqda aabbihiis iyo Fircoon isku maalin. Fircoonkii hore ee bilaabay inuu caasimadda Masar ka raro Thebes isagoo u celinaya Saddex xagalka Niil, meel lagu magacaabo *Avaris/Zoan/Tanis* oo hore caasimad ugu ahaan jirtay Hyksos ka, waxay ahayd *Seti I* (1309-1290). Waxa uu noqon karaa Fircoonkii sameeyay kasoo horjeesashada.
 - . Tani waxay u muuqataa inay ku habboontay labada warbixinood ee ku saabsan This xukunkii Hyksos ee Masar.
 - (1) Caddayn laga helay wakhtigii Ramsiis II oo xusaysa asaasitaanka asaasitaanka Haramka afar boqol oo sano ka hor (1700's C.H. Hyksos ka).
 - (2) waxsii sheegista Bilowgii 15:13 waxay ka hadlaysaa 400 sano oo kasoo horjeesasho ah.
 - b. tani waxay tusinaysaa in Yuusuf qabashadiisii awooddu ay ku hoos timid *Hyksos* (Semitig) Fircoon. Qoyska cusub ee Masriga ahina wuxuu yahay mid u noqonaya Baxniintii. 1:8.
 2. *Hyksos* waa erey Masri ah oo macnihiisu yahay “xaakinnada dhulalka shisheeye,” kuwaasoo ahaa koox xaaknio semetiga ah oon ahayn Masaari, isla markaasna xukumay Masar intii u dhaxaysay qarniyadii 15aad iyo 16aad (1720-1570 C.H.). qaar ayaa raba in ay iyaga la xidhiidhiyaan Yuusuf markii uu xukunka usoo kacay. Haddii aan 430 sano ee Baxniintii 12:40 ka jarno 1720 C.H., waxa aan helaynaa taariikh ku dhowaad ah 1290 C.H.
 3. *Seti I* wiilkiisu wuxuu ahaa Rameses II (1290-1224). Magacanna waxa lagu sheegay mid ka mid ahaa magaalooyinkii kaydka ee ay dhiseen addoomadii Cibraaniyiintu, Baxniintii 1:11. Sidoo kale degmadan mid la mida oo ku sugan Masar una dhow Godhen waxa lagu magacaabaa Rameses, Bilowgii. 47:11. *Avaris/Zoan/Tanis* waxa loo yaqaanay “Guriga Rameses” lagasoo bilaabo 1300-1100 C.H.
 4. Thutmose III waxa loo yaqaanay dhismihii waynaa, siduu ahaa Rameses II.
 5. Rameses II wuxuu lahaa 47 gabdhood oo ku kala noolaa meelo kala duwan.
 6. Cilmiga taariikhii qadiimiga ahaa ayaa waxa uu tusinayaa in magaalooyinka ugu waawayn ee gidaarada lahaa kuna yaallay Kancaan (Hazor, Debir, Lachish) la burburiyey oo si isdaba jooga loo dhisay ku dhowaad 1250 C.H. ogolaanshaha 38 sano oo duurka ahi waxay tahay wakhti ku habboona taariikhda 1290 C.H.
 7. Cilmiga barashada taariikhaha qadiimiga ahi wax uu helay Israa’iiliyiinta oo u noqonaya inay ku noolaayeen koonfurta Kancaan iyagoo ku sugan caddaymo u noqonaya Rameses xukunkiisii *Merneptah* (1224-1214 C.H. [cf. The Stele of Merneptah, oo taariikhdiisu u noqonayso, 1220 C.H.]).
 8. Edom iyo Moab waxay u muuqdaan inay inay ku guuleysteen aqoonsi caalami ah aakhirii 1300 C.H. waddamadanina may ahayn kuwo habaysan qarnigii 15aad (Glueck).
 9. kitaabka cinwaankiisu yahay *Redating the Baxniintiius and Conquest* oo uu leeyahay John J. Bimson, laguna daabacay Jaamacadda Sheffield, 1978, ayaa la doodaya caddaymaha dhammaanba cilmiga taariikhii hore ee u noqonaya taariikhii hore.
- C. Waxa jirta taariikh suurto gala oo cusub oo xitaa ka horraysa 1445 C.H. Eeg the History Channel, “The Baxniintiius Decoded,” oo ka hadlaya dhinacyada woqooyiga.

7:19 middani waxay ku sugantahay Baxniintii. 1:10ff.

7:20 “**Muusena wakhtigaasuu dhashay**” waxay ku xusantahay Baxniintii 2.

“**oo wuxuu ahaa wax qurux badan**” waa odhaah Cibraaniga lagu tusiyo quruxda (cf. Baxniintii. 2:2). Xitaa Josephus ayaa faallo ka bixinaya quruxdii Muuse (cf. *Antiq.* 2.9.6).

7:21 waxay ku sugan tahay Baxniintii. 2:5-6,10.

▣ “**markii la tuurayna**” waa ereyga Giriigga ah *ektithēmi*, oo loogala jeedo “fogayn” (aayadda 19) ama “bannaan dhigis.” Masaaridu waxay Cibraaniyiinta ku qasbeen in carruurtooda ragga ah la laayo oo bahalaha la siiyo si loo xadeeyo korodhka tirada dadkooda.

▣

NASB, NKJV “**Fircoon gabadhiisii ayaa qaadatay**”

NRSV, NJB “**Fircoon gabadhiisii ayaa korsatay**”

TEV “**gabadhii boqorka ayaa korsatay**”

Ereyga *anaireo* macno ahaan waa “kor u qaadis.” Muuse “kor ayaa loo qaaday” iyadoo laga saaray webiga sidanna waxa uu ku noqday wiilka Fircoon gabadhiisa.

7:22 Muuse waxa uu lahaa aqoon wanaagsan iyo tabobar milatari oo wanaagsan wakhtigiisaan isagoo ku lahaa xukunka Fircoon.

▣ “**hadalladiisa iyo falimihiisana xoog buu ku lahaa**” tani waxay soo koobitaan u noqonaysaa noloshii Muuse maxaa yeelay markii uu YHWH kula kulmay kaynta gubanaysa waxa uu sheegtay inaanu si fiican u hadli karin (cf. Baxniintii. 4:10-17).

7:23-24 waxay middani ku sugan tahay Baxniintii. 2:11-12.

7:23 “**markuu gaadhay afartan sannadood**” waxaan u malaynayaa inuu ahaa D. L. Moody kii yidhi Muuse noloshiisa waxa loo qaybin karaa saddex qaybood oo afartan ah:

1. afartankii sano ee ugu horreysay waxa uu u malaynayay inuu yahay shakhsi (wax ku bartay Fircoon agtiisa)
2. afartankii sano ee labaad waxa uu u maleeyay inuu yahay waxba (loo musaafuriyay dhulkii Midyaan isagoo bartay jidadka saxaraha Siinay)
3. afartankii sano ee saddexaad waxa uu gartay waxa Ilaah u qaban karo qofaan waxba ahayn (u hoggaami dadka Ilaah Dhulka Ballan qaadka.)

7:25 aayaddani waxa weeyi midda uu Istefanos runta u haystay (suurto gal dhaqanka Yuhuudda); may ansixinin Baxniintii.

7:26-29 waxay middani ku sugantahay Baxniintii. 2:13-14.

7:28 su’aashani waxay filaysaa jawaab “maya” ah.

7:29 “**Muuse hadalkaas aawadiis cararay**” middani waxay ku diiwaan gashantahay Baxniintii. 2:15,22. Muuse waxa uu ka cabsaday dilitaanka mid Masri ah isaga oo tusinaya in Fircoon aanu taageeraynin waxa uu sameeyay maadaama oo uu yahay wiil ay korsatay gabadhiisu. Xitaa middaasna waxa tusinaysa Cibraaniyada 11:27.

▣ “**oo sidii ajanabi buu dalka Midyaan u degganaa**” Ilaah waxa uu Muuse uugu muuqday kayntii gubanaysay ee dhulka Midyan (cf. Baxniintii 3-4) isagoo sharcigiisana uugu muujiyay Buur Siinay oo ah dhulka Midyan (cf. Baxniintii 19-20), taasi oo tusinaysa inaanayn xad lahayn meesha Ilaah isku muujinayo. Muujinta

Ilaah naftiisa muujinayo oo ka baxsan Macbadka ku yaalla Yeruusaalem ayaa waxa laga arkayaa Fal 7:36, 44, 48, iyo 53.

▣ “meeshaasna laba wiil buu ku dhalay” waxay middani ku sugantahay Baxniintii. 2:22; 4:20; 18:3-4.

NASB (UPDATED) TEXT7:30-34

³⁰Markii afartan sannadood dhammaatay dabadeed ayaa waxaa isagii Buur Siinay cidladeedii uga muuqatay malaa'ig ku dhex jirta geed dab ka ololayo. ³¹Oo markii Muuse arkay ayuu wuxuu arkay la yaabay, oo intuu u soo dhowaanayay inuu arko. ayaa waxaa u yimid codkii Rabbiga oo leh, ³²Anigu waxaan ahay Ilaaha awowayaashaa, Ilaaha Ibraahim iyo Ilaaha Isxaaq iyo Ilaaha Yacquub. Markaasaa Muuse gariiray oo ku dhici waayay inuu eego. ³³ Markaasaa Rabbigu isaga ku yidhi. Kabaha cagahaaga ka furfur; maxaa yeelay, meesha aad ku taagan tahay waa dhul qoduus ah. ³⁴Dadkayga Masar jooga rafaadkooda waan arkay, taahoodana waan maqlay. oo waxaan u imid inaan samata bixiyo; haddaba kaalay, Masar baan kuu diri doonaaye.

7:30 Middani waxay ku sugantahay Baxniintii, cutubyada 3 iyo 4.

▣ “malaa'ig” Axdiga Hore dhexdiisa malagani waa YHWH. Eeg fiirada 5:19. Fiiro u yeelo sida ay tahay dabeecadda malagani.

1. Baxniintii. 3:2, “malaa'igtii Rabbigu waxay uga muuqatay dab ololaya”
2. Baxniintii. 3:4, “markuu Rabbigu arkay inuu ku soo leexday”
3. Baxniintii. 3:4, “Ilaah uga yeedhay geedka dhexdiisii”

Eeg Mawduuca Gaarka ah: Magacyada Ilaahnimada 1:6.

▣ “Buur Siinay” eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: MEESHA AY KU TAALLO BUUR SIINAY

- A. Haddii Muuse uu u hadlayay si caadi ah oo ahayn wax tusinta “saddexda maalmood ee socodka” ee Fircoon (3:18; 5:3; 8:27), taasi iyaga umay ahayn wakhti dheeroo ku filan si ay u gaadha koonfurta jasiirad u egta Siinay. Haddaba, culimada qaar ayaa buurta ku sheegay inay u dhowday gacanka Kadesh-Barnea.
- B. Goobta dhaqan ahaaneed waxa la yidhaahdaa “Jebel Musa.” Bannaanka Denbiga, oo waxyaalo dhowra leh.
 1. Bannaan wayn oo ku horyaalla Buura
 2. Sharciga Kunoqoshadiisa 1:2 waxa uu leeyahay waxay ahayd kow iyo toban cisho oo looga soconayo Buur Siinay ilaa Kadesh-Barnea.
 3. ereyga “Siinay” maaha erey Cibraani ah. waxa laga yaabaa in lala xidhiidhiyay Bannaanka Denbiga, kaasi oo tilmaamaya baaddiyaha yar ee saxaraha ah. Magaca Cibraaniga ah buurto waa Horeb.
 4. Buur Siinay waxay ahayd goob dhaqan ilaa qarnigii afraad C.D. waxa ay ku dhex taallaa dhulka Midyan kaasi oo koobsanaya dhul badan oo ah jasiirad u egta Siinay iyo Carabta.
 5. Waxay u muuqataa cilmiga taariikhaha qadiimka ahi inuu ansixiyay goobta ay dhacaan magaalooyin ka mida kuwa lagu xusay Baxniintii (*Elim, Dophkah, Rephidim*) oo ku yaalla dhinaca galbeed ee Jasiirad u egta Siinay.
- C. Yuhuuddu weligood may xiisaynayn goobaha juquraafi ahaaneed ee Buur Siinay. Waxa ay rumaysnayeen in Ilaah iyaga ku siiyay Sharciga oo uu ku oofiyay ballan qaadkiisa ku sugan Bilowgii. 15:12-21. “halkay” may ahayn muhiimadda ujeedadooduna may ahayn inay soo ceshadaan oo xusan (ma jiro xaj sanadle ahi oo lagu booqdo).

- D. Goobta dhaqan ahaaneed ee Buur Siinay lama asaasin ilaa lagasoo gaadho *Pilgrimage of Silvia*, oo la qoray ku dhowaad C.D. 385-8 (cf. F. F. Bruce, *Commentary on the Book of the Acts*, p. 151).
- E. Waxa maanta jirta oo la rumaysanyahay meel suurto gala oo cusub kuna dhowo Khaliijka Caqaba ee Carabiya. Waxa la sheegay in
1. dhulka Midyan uu hadiyo goor khaas u ahaa Carabiya.
 2. in sida ku sugan Galatiya. 4:25 Bawlos uu ku sheegayo inay ku taallo Carabiya.
 3. qamar sinaaciga khariidadaha dejiya oo muujiyay wado hore oo ka imanaysa Masar una gudbaysa Jasiirad u egta Siinay oo leh dhagaxaan isla markaana u gudbaya Khaliijka Caqaba
 4. cidhifka ugu sarreeya meeshan waxa laga dhigay madaw (cf. Baxniintii. 19:16,18)
- Waxa waajib ah in dib loo sheego lana yidhaahdo garan mayno meesha ay tahay goobtani!

7:32 middani waxay ku sugan tahay Baxniintii. 3:6.

▣ “awowayaashaa” qoraalka Cibraaniga iyo tarjumaadda Giriigaba (Sabtuujanti) eraygani waa mid. Meelaha kale ee ay kusoo aroortayna waa jamac. Ilaah waxa uu ogaa Muuse aabbihiisii addoonka ahaa.

7:33 middan waxa laga helayaa Baxniintii. 3:5. Muuse bannaanka wuxuu u aaday cabsi ee may ahayn cibaado. Sababta uu kabiihsa isaga saaray lama hubo.

1. kabuhu laga yaabaa inay wasakh lahaayeen (i.e., saxaro xayawaan)
2. kaba saaristu waxa laga yabaa inay calaamad u ahayd qoyska dhexdiisa (i.e., guriga).
3. inuu dhaqan u ahaa wadaado diimeedyadii Masaraaida

7:34 middani waxay ku sugan tahay Baxniintii 3:7. Waxay ila tahay in aayaddani fiqi ahaan ay middan muhiim ugu tahay: YHWH waxa uu maqlay baryadooda isaga oo markaana ka jawaab celiyay. Waxa uu u yimid inuu iyaga badbaadiyo, laakiin u fiirso badbaadadiisa oo saamaysay aadanaha oo dhan. Ilaah waxa uu diray Muuse, waxaanu doortay inuu aadanaha kula tacaalo aadane iyaga la mida.

NASB (UPDATED) TEXT: 7:35-43

³⁵Muusahakan ay diideen oo ku yidhaahdeen, Yaa kaa dhigay taliye iyo xaakin? isagaa Ilaah ugu soo diray gacanta malaa'igtii geedka uga soo muuqatay inuu ahaado taliye iyo samata bixiye. ³⁶Kanaa iyaga Masar ka soo saaray, oo yaabab iyo calaamooyin ku sameeyey Masar, iyo Badda Cas, iyo cidlada afartan sannadood. ³⁷Kanu waa Muusihii ku yidhi reer bini Israa'iil, Ilaah wuxuu walaalihiin idiinka dhex kicin doonaa nebi sidayda oo kale. ³⁸Kanu waa kii ku dhex jiray kiniisaddii cidlada oo la jiray malaa'igtii isaga kala hadashay Buur Siinay iyo awowayaasheen. kii la siiyey hadallada nool inuu ina siiyo. ³⁹Isaga awowayaasheen ma ay doonaynin inay addecaan, laakiin intay iska riixeen ayay qalbigooda geliyeen inay Masar dib ugu jeestaan. ⁴⁰oo waxay Haaruun ku yidhaahdeen. Inoo samee ilaahyo ina hor socda; maxaa yeelay, Muusihii inaga soo kaxeeyey dhulka Masar garan mayno waxa ku dhacay. ⁴¹Markaasay waxay wakhtigaas sameeyeen weyl, oo sanamkii waxay u keeneen allabari, oo waxay ku farxeen shuqulkii gacmahoodu sameeyeen ⁴²laakiin Ilaah baa ka jeestay, oo wuxuu faraha uga qaaday inay u adeegaan guutada samada; sida ay ugu qoran tahay kitaabka nebiyada, Bal reer bini Israa'iilow. afartankii sannadood oo aad cidlada joogteen, Ma anigaad i siiiseen xoolo qalan iyo allabaryo? ⁴³Weliba waxaad qaadateen taambuuggii Molokh Iyo xiddigtii ilaaha Remfan, Oo ah waxyaalihii aad u samaysateen inaad caabuddaan . Haddaba waxaan idiin kaxayn doonaa Baabuloon shishadeeda.

7:35 “Muusahakan ay diideen” Dadka Ilaah si joogto ah ayay u diideen afhayeenka Ilaah (cf. aayadaha. 51-52). Waxa laga yaabaa in tani ay noqonayso ujeedada aayadda. 27!

▣ **“isagaa Ilaah ugu soo diray gacanta malaa'igtii geedka”** Markale ayaa Ilaah Israa’iliyiinta ugu yimid meel ka baxsan Dhulka Ballanqaadka. Ilaah shaqadiisa meelina ma xadayso. In badan oo taariikhda Israa’iil ahina waxay kusoo aroortay meel ka baxsan Kancaan iyo Macbadka ku yaalla Yerusaaalem. Dhammaanba taariikhda Israa’iil hoggaamiyayaasha Ilaah waxa diiday dadkooda (cf. aayadaha. 9,27-28,35,39). Tanina waa arrin soo noqnoqnaysa.

Malaggan waxa waxa loo sheegay sidii ilaahnimo (Baxniintii 3:2,4). Muujintan ilaahiga ah sidoo kale waxa lagu arki karaa Bilowgii. 16:7-13; 22:11-15; 31:11,13; 48:15-16; Baxniintii. 13:21; 14:19; Xaakinnadii. 2:1; 6:22-23; 13:3-22; Sekeryaah. 3:1-2. Si kastaba ha ahaatee, waa in la sheego iyada oo “malagga Rabbigu” aanu hadiyo goor ahayn mid ilaahnimadu jidh ahaan ka muuqanayso; mararka qaarna waa malag keliya, rasuul (cf. Bilowgii. 24:7,40; Baxniintii. 23:20-23; 32:34; Tirintii. 22:22; Xaakinnadii. 5:23; II Samuu’eel. 24:16; I Taariikhdi. 21:15ff; Sekeryaah. 1:11; 12-13).

7:36 tani waxay soo koobaysaa awooddi mucjisada ah ee Ilaah (i.e., kalkaalayaha Muuse) ee Muuse iyo Haaruun.

7:37-38 waa xigasho ku saabsan Masiixa oo ka ahaatay Sharciga Kunoqoshadiisa 18:15. Istefanos waxa uu magacaabayaa joogitaanka Ilaah ee wakhtigii Baxniintii iyo wakhtigii Bannaanka isaga oo ah Malagga Ilaah iyo magacaabaha gaarka ah ee Muuse (Masiixa, nebiga). Istefanos ma diidayo Muuse, laakiin si runa ayuu u dhegaysanayaa!

7:38 “kiniisaddii” tani waa ereyga Giriigga ah ee *eklesia*, laakiin waxa loo adeegsaday iyadoo tusinaysa macnaha isoo ururitaanka oon ahayn kaniisad. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Kaniisad 5:11.

▣ **“malaa’igtii isaga kala hadashay Buur Siinay”** fiqiga rabbaanigu waxa uu sheegay in malaa’igtu dhexdhexaadiyayaal u tahay YHWH iyo bixinta Sharciga (eeg firada 7:53). Waxa sidoo kale suurto gal ah in malagu uu sheegayo YHWH laftiisa (cf. Baxniintii. 3:21 oo la barbar dhigay 14:19; iyo sidoo kale Baxniintii. 32:34; Tirintii. 20:16; Xaakinnadii. 2:1).

7:39 “Isaga awowayaasheen ma ay doonaynin inay addeecaan” Istefanos waxa uu middan la xidhiidhinayaa addeecis la’aantii Axdiga Hore. Ujeedadiisu waxay tahay in Yuhuuddu ay hadiyo goor diideen hoggaamiyayaasha Ilaah, iminkana waxay diideen Masiixa.

“iska riixeen” middani waxay ku sugantahay Tirintii. 14:3-4.

7:40-41 middan waxa laga helayaa Baxniintii 32. Tani may ahayn sanam caabudis, laakiin waa abuuritaanka muuqaalka jidh ahaaneed ee Ilaah. markii danbana waxay isku rogtay caabudis.

7:41 Istefanos dibigii ama waylkii dahabka ahaa wuxuu u fashirayaa sanam caabudis waxaanu adeegsanayaa dhacdadani taariikh ahaaneed si uu uga hadlo xigashada ka ahaatay Caamoos 5, taasi oo ka tarjumaysa Israa’iil, xitaa marka dib loogu noqdo Baxniintii iyo Cidladii waxay ahaayeen kuwo caasinnimo sameeya oo sanam caabudis sameeyay.

7:42 “Ilaah baa ka jeestay, oo wuxuu faraha uga qaaday inay u adeegaan” aayadaha 42 iyo 43 waxa weeyi xigasho ka ahaatay Caamoos 5:25-27 halkaasoo Caamoos uu ku sheegayo in Israa’iil hadiyo goor sanamyada qurbaan u bixiyaan. Waxa ay ahayd wax caadi ah, oo ah tusaale taariikhda hore ah (Yashuuca 24:20). Tani waxa ay xasuusinaysaa mid ka mida diidmooyinka ku sugan Rooma 1:24,26,28.

▣ **“guutada samada”** tani waxa ay tilmaamaysaa Ashuuriya iyo Baabiloon caabudistoodii (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 17:3; II Boqorradii. 17:16; 27:3; II Taariikhdi. 33:3,5; Yeremyaah. 8:2; 19:13). Waxa jira dhibaatooyin ka dhex taagan qoraallada Cibraaniga (MT) ga Caamoos 5:25-27, qoraalka Giriigga (LXX) iyo xigashada Istefanos:

1. magaca ilaaha xidiga. MT gu waxa uu dhigayaa *kywn* ama *kaiwann*, waana magaca Ashuuriga ee meeraha Saatun. LXX kuna waxa uu dhigayaa *rypn* ama *raiphan*, oo noqon kara *repa*, oo ah magaca Masaariga ah ee ilaaha Saatun.
2. qoraalka Cibraaniga ah (MT) iyo qoraalka Giriigga (LXX) waxay dhigayaan “Dimishiq shishadeeda” halka Istefanos uu kasoo xiganayo “Baabilon shishadeeda.”

Ma jiro qoraal gacmeed la garanayo oo Caamoos leeyahay oo akhriskaas koobsanaya. Istefanos waxa laga yaabaa inuu isla xidhiidhinayay musaafurintii Ashuriyiinta kaasi oo uu Caamoos kala hadlayo musaafurintii danbe ee Baabiloonku ku sameeyeen Yahuudah, laakiinse uu bedelayo meesha musaafurinta.

Caabuditaanka xidigu waxa uu ka bilaabmay Mesobatamiya, laakiin waxa uu ku faafay Siiriya iyo Kancan (cf. Ayuub 31:26,27). Waxyaalaha lagu helay cilmiga taariikhaha qadiimka ah ee Tell El-Amarna, kaasi oo koobsanaya boqollaal waraaqood oo ka ahaaday Kancan una socday Masar qarnigii 14aad C.H. ayaa sidoo kale ilaahyadan xiddigaha u adeegsanaya goobo magacyadood.

☐ **“kitaabka nebiyada”** tani waxa ay sheegaysaa qoraalka koobsanaya labo iyo tobanka nebi ee hoose (13:40). Xigashada ku sugan aayadaha 42-43 waxa ay ka ahaatay Sabtuujantiga Caamoos 5:25-27. Weedha xigta ee aayadda 42 ayaa waxay tahay su’aal filaysa jawaab ah “maya.”

7:43 “Molokh” shibbanayaasha ereyga Cibraaniga ah ee boqor waa *mlk* (BDB 574). Waxa jira sanamyoo dhowra oo Kancaniyiintu leeyihiin oo magacyadoodu ay ka kooban yihiin saddexdan shibbanayaal *Milcom*, *Molech*, ama *Moloch*. *Moloch* waxa uu ahaa ka ugu sarreeya sanamyada Amoretiska kuwaasoo carruurta la hordhigi jiray si loo damaanad qaado caafimaadka iyo barwaaqowga ummadda (cf. Laawiyiintii. 20:2-5; Sharciga Kunoqoshadiisa. 12:31; I Boqorradii. 11:5,7,33; II Boqorradii. 23:10,13,14; Yeremyaah. 7:31; 32:35). A. T. Robertson, ayaa kitaabkiisa *Word Pictures In the New Testament*, vol. 3, p. 93, waxa uu ku leeyahay *Molokh* waxa uu ahaa “mid sawirka madaxiisu yahay dibi oo kale isla markaana lahaa gacmo fidsan oo carruurta la dul saari jiray iyadoo xagga hoosana laga bannayn jiray si dabku aanu xagga hoose uuga gubin.” Sheegitsa ereyga *Molekh* ee ku sugan Laawiyiintii 18:21 waxa uu macnihiisu tusinayaa galmo aan habboonayn, taasi oo culimada qaarkood ku sababtay inay u arkaan in aan carruurta loo bixin jiray *Molokh*, laakiinse la hor dhigi jiray dhillooyinka rag iyo dumarba leh. waxa haddaba arrintu ay ku habboontahay cibaadooyinka guud ee la samayn jiray.

☐ **“taambuuggii”** eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: CALAAMAD

Dhibaatu waxay tahay erayga *tupos*, oo loo adeegsado macnayaal dhor ah:

1. Moulton and Milligan, *The Vocabulary of the Greek New Testament*, p. 645
 - a. Tusaale
 - b. Qorshe
 - c. Qaab ama nidaam qoraaleed
 - d. Go’aan
 - e. Weedh
 - f. Qaabka jidhka aadanaha oo la hordhigaya ilaaha bogsinta
 - g. Falka waxa loo adeegsaday macne tusinaya xoogaynta sharciga
2. Louw and Nida, *Greek-English Lexicon*, vol. 2, p. 249
 - a. Xagtin (Yooxanaa 20:25)
 - b. Sanam (Falimaha Rasuullada 7:43)
 - c. Tusaale (Cibraaniyada 8:5)
 - d. Tusaale/ ekaansho (1 Korintos 10:6; Filiboy 3:17)
 - e. Sawir la xidhiidha qaabka (Rooma 5:14)
 - f. Nooc (Falimaha Rasuullada 23:25)

- g. koobsasho (cf. Fal 23:25)
- 3. Harold K. Moulton, *The Analytical Greek Lexicon Revised*, p. 411
 - a. Calaamad (Yooxanaa 20:25)
 - b. Sawir gacmeed
 - c. Sanam (Falimaha Rasuullada 7:43)
 - d. Sawir (Rooma 6:17)
 - e. Jaantus (Falimaha Rasuullada 23:25)
 - f. Tusaale (1 Korintos 10:6)
 - g. Nooc (Rooma 5:14; Cibraaniyada 8:5)
 - h. Tusaale maaddi ah (Falimaha Rasuullada 7:44; Cibraaniyada 8:5)
 - i. Tusaale akhlaaqeed (Filiboy 3:17; 1 Tesaloniika 3:9; 1 Timoteyos 4:12; 1 Butros 5:3)

Marka la eego macnaha waxa ay u muuqataa # inuu yahay ka ugu habboona. Injiilku waxa uu koobsanayaa caqiidooyin iyo qaab nololeed, badbaadaduna waxay u baahan tahay nolol la mida tii Masiixa oo kale!

NASB (UPDATED) TEXT: 7:44-50

⁴⁴Awowayaasheen waxay cidlada ku hayeen taambuuggii maragga. sidii kii Muuse la hadlay ugu amray isaga inuu u sameeyo sidii qaabkii uu arkay. ⁴⁵Kaas ayaa awowayaasheen markoodii la soo qaadeen Yashuuca markay galeen oo qaateen dhulkii quruumihii Ilaah awowayaasheen hortooda ku eryay, ilaa waagii Daa'uud. ⁴⁶Daa'uudna Ilaah hortiis ayuu wanaag ka helay, oo wuxuu weydiistay inuu Ilaahii Yacquub u helo meel uu dego. ⁴⁷laakiinse Sulaymaan baa guri u dhisay. ⁴⁸Hase ahaatee Kan ugu sarreeya ma dego guryo gacmo lagu sameeyo; sida nebigu leeyahay, ⁴⁹Samadu waa carshigayga, Dhulkuna waa meeshaan cagaha saarto, Rabbigu wuxuu leeyahay, Guri caynmaad ii dhisi doontaan ? Ama maxay tahay meeshaan ku nastaa? ⁵⁰Miyaan gacantaydu samayn waxyaalahan oo dhan?

7:44 waxa middani ay ku sugantahay Baxniintii, cutubyada 25-31; 36-40. Qorshayaashan faahfaahsan ee waabka waxa Muuse loogu muujiyay Buur Siinay. Axdiga Cusub ee Cibraaniyadu waxa uu ka hadlayaa waabka samaawiga ah (cf. 8:5-6; 9:11,23) ee kan dhulka lagasoo maynguuriyay. Sidii Istefanos hore uugagasoo hadlay cutubkan dhexdiisa isaga waxa lagu eedeeyay inuu kasoo horjeed Muuse (cf. 6:11), iminkana waxa uu bilaabayaa xukunka labaad oo ah inuu kasoo horjeedo Macbadka (6:13).

▣ **“qaabkii”** eeg Mawduuca Gaarka ah 7:43.

7:45 tani waxa ay daboolaysaa wakhtigii qabsashada (mid ahaan 1400 ama 1250 C.H.) ilaa wakhtigii Daa'uud (± 1011 C.H. ilaa 971/70 C.H., Harrison; 973 C.H., Young; 961 C.H., Bright).

7:46 tani waxay ka tarjumaysaa II Samuu'eel 7, oo ah aayado muhiim ah. boqortooyada Daa'uud waxa lagu aasaasay arrin ilaahi ah.

7:47 “Sulaymaan baa guri u dhisay” waxa middan laga heli karaa I Boqorradii 6-8 iyo II Taariikhdiisii 1-6.

7:48 hadalkani waxa uu la midyahay midka Sulaymaan ee ku sugan I Boqorradii. 8:27 iyo II Taariikhdiisii. 6:18.

7:49-50 xigashadan waxa lagasoo qaatay Sabtuujantiga Ishacyaah. 66:1-2. Muhiimadduna waxa weeyi in Sulaymaan uu aqoonsanaa dhismahan oon deeqayn Ilaah khaaliqa ah!

Aayadahani ma waxay tusinayaan doodda ka qayb qaadashada kuwa aan ahayn Yuhuudda? Haddii ay sidaas tahay, waxay u muuqataa in wax la deday. Si kastaba ha ahaatee, Sulaymaan laftiisu macbadka wuxuu u arkay meel dunidu uugu timaaddo YHWH cf. I Boqorradii. 8:41-43). Waxay ahaayeen Yuhuuddii ku hadlaysay

luqada Giriigga (toddobada ku sugan Fal 6) kuwaasoo arkay isla markaana faafiyay adeegga caalamiga ah xitaa ka hor intii Rasuulladu aanay aqoonsanin dhinacan waxbarista ah ee Ciise (cf. Matayos. 28:18-20; Fal 1:8). I Stefanos waxa laga yaabaa inuu tan ku sheegayay macnaha ka muuqda aayadda 50.

NASB (UPDATED) TEXT: 7:51-53

⁵¹**Idinkan madaxa adag oo aan qalbiga iyo dhegaha laga gudinow, weligiinba Ruuxa Qoduuska ah waad hor joogsataan. Sidii awowayaashiin yeeli jireen oo kale ayaad idinna yeeshaan.** ⁵²**Bal nebiyada kee baan awowayaashiin silcin? Xataa iyagu waxay dileen kuwii hore u sheegay imaatinka Kan xaqa ah; kan idinku aad haatan gacan geliseen oo disheen.** ⁵³**Waxaad sharciga u hesheen sidii wax malaa'igahu hagaajiyeen, laakiinse ma aydnaan xajin.**

7:51 “Idinkan” I Stefanos waxa uu kasoo jeesanayaa hoggaamiyayaashii Yuhuudda iyo dadkii wakhtigii hore caasinimadooda isaga oo usoo laabanaya hoggaamiyayaasha hadda iyo dadkan ku sugan macbadka ee dhegaysanaya farriintiisa. Waxay ahaayeen oo yihiin kuwo kasoo horjeeda YHWH!

▣ **“madaxa adag”** I Stefanos waxa uu si dadban wax ugu sheegayaa qaabkii Muuse ula hadli jiray carruurta Yacquub Israa’iil (cf. Baxniintii. 32:9; 33:3,5; 34:9; Sharciga Kunoqoshadiisa. 9:6).

▣ **“oo aan qalbiga laga gudinow,”** ereyadan maldahan xagga Cibraaniga waxa loogala jeedaa aan rumaysad lahayn, disloyal, daacad la’aan (cf. Laawiyiintii. 26:41; Yeremyaah. 9:25-26; Yexesqeel. 44:7). Tanina waa kasoo horjeedka Sharciga Kunoqoshadiisa. 10:16; Yeremyaah. 4:4!

▣ **“iyo dhegaha”** hadalkan maldahani waxa uu tilmaamayaa doonis la’aantooda ku waajahan ka jawaab celin la’aanta rasuullada Ilaah (cf. Yeremyaah. 6:10).

▣ **“weligiinba Ruuxa Qoduuska ah waad hor joogsataan”** middani waxay aad uula mid tahay Ishacyaah. 63:10. Jacaylka Ilaah iyo runsheegnimadiisa waxa lagu muujiyay Ishacyaah. 63:9,11-14, laakiin dadku waxay noqdeen kuwo rumaysad laawayaal ah!

7:51b-52 tani waa xukumitaanka xooggan ee hoggaanka Yuhuudda wakhtigaas, iyadoo la mida hoggaamiyayaashii Israa’iiliyiinta ee hore. Dadkii hore ee Ilaah waxay laayeen rasuullada Ilaah iminkana waxa ay dileen Masiixa (cf. 3:14; 5:28).

7:52 “Kan xaqa ah” magacan waxa loo adeegsaday Ciise sida ku xusan 3:14 iyo 22:14. Eeg fiirada 3:14 iyo Mawduuca Gaarka ah: Xaqnimada 3:14.

7:52 “sidii wax malaa’igahu hagaajiyeen” tani waxa ay tilmaamaysaa fasiraaddii rabbaaniyiinta ee Sharciga Kunoqoshadiisa 33:2 oo ka ahaatay Sabtuujantiga halkaasoo Ilaah uu sharciga Muuse ku siiyay isagoo soo mariyay malag dhexdhexaad ah, taasi oo u muuqata in lagu ansixinayo Galatiya. 3:19 iyo Cibraaniyada. 2:2.

▣ **“laakiinse ma aydnaan xajin”** I Stefanos is difaacistiisa wuxuu ku furay “dhegaysta” (BDB 1033) taasi oo laga yaabo inay ka tarjumayso *Shema*, “dhegaysta oo u fiirsada” (Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4). I Stefanos iyo warqadda Yacquub (Ciise walaalkiisii xagga hooyo) labaduba waxay sheegayaan “noqda kuwo ku dhaqma erayga oon noqonin dhegaystayaal keliya” (cf. Yacquub 1:22-23 raacaya Ciise, Matayos. 7:24-27; Luukos 11:48; Yooxanaa 13:17; sida Bawlos yeelay, Rooma. 2:13).

NASB (UPDATED) TEXT: 7:54-60

⁵⁴**Haddaba markay waxyaalahaas maqleen way ka xanaaqeen oo u ilka jirriqsadeen isaga.** ⁵⁵**laakiin isagoo Ruuxa Qoduuska ahu ka buuxo ayuu samada aad u fiiriyey, oo wuxuu arkay ammaanta Ilaah iyo Ciise oo midigta Ilaah taagan.** ⁵⁶**oo wuxuu yidhi, Bal eega, waxaan arkayaa samooyinkii oo la furay iyo**

Wiilkii Aadanaha oo midigta Ilaah taagan ⁵⁷laakiin markaasay cod weyn ku qayliyeen oo dhegaha furaysteen, oo iyagoo isku wada qalbi ah ku yaaceen isagii. ⁵⁸Markaasay intay magaalada ka soo saareen dhagxiyeen: kuwii maragga ahaana dharkoodii waxay ag dhigteen nin dhallinyaro ah oo la odhan jiray Sawlos. ⁵⁹Markaasay dhagxiyeen Istefanos oo Rabbiga baryaya oo ku leh, Rabbi Ciisow, ruuxayga qaado. ⁶⁰Markaasuu jilba joogsaday oo cod weyn ku qayliyey oo ku yidhi. Rabbiyow, dembigan dushooda ha ka dhigin. Oo markuu sidaas yidhi, ayuu dhintay.

7:54 “iyagu” tani waxay ay tilmaamaysaa xubnihii Senhadriinka (cf. 6:15).



NASB “way ka xanaaqeen”

NKJV “ka qalbi xumaadeen”

NRSV “way cadhoodeen”

TEV “waxay noqdeen kuwo xanaaqa”

NJB “way cadhoodeen”

Waa fal aan dhammays tirnayn oo mafcuulku soo horreeyo. Macno ahaan waxa weeyi “way cadhoodeen” (cf. 5:33). Farriinta Istefanos waxay ku socotaa hoggaamiyayaasha, laakiin halkii ay ka towbad keeni lahaayeen, siday weligoodba yeeli jireen, waxay ku socdeen diidmo iyo dhiig qabis (5:33).

▣ “ilka jirriqsadeen” tani waxay calaamad u tahay cadhada (cf. Ayuub 16:9; Sabuurka 35:16; 37:12; Baroor. 2:16).

7:55 “Ruuxa Quduuska . .Ilaah. . .Ciise” fiiro u yeelo sheegitaanka Ilaah Saddexmidnimada. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:32-33.

▣ “isagoo Ruuxa Qoduuska ahu ka buuxo” arrinta ah Ruuxa oo ka buuxa waxa ay gaar u tahay Falimaha Rasuullada (i.e., *pleroo*, cf. 2:4; 4:8,31; *pleres*, cf. 6:3,5,8; 7:55; 11:24). eeg fiirada 5:17.

xaqiiqooyinka kitaabiga ah ee la xidhiidh Ruuxa waxa ay ku salaysan yihiin:

1. shakhsiga Ruuxa (cf. Yooxanaa 14-16)
2. baabtiiska Ruuxa (cf. I Korintos. 12:13)
3. midhaha Ruuxa (cf. Galatiya. 5:22-23)
4. hadiyadaha Ruuxa (cf. I Korintos. 12)
5. ka buuxsanaanta Ruuxa (cf. Efesos. 5:18)

Dhammaan kuwan, Falimaha Rasuulladu waxa uu diiradda ka saarayaa #5. Hoggaamiyayaashii kaniisaddii ugu horraysay waxa ay ahaayeen kuwo marka kasta la siinayay awood waxaanay faafinayeen injiilka Ciise Masiix. Xaaladda Istefanos wax ku oolnimada wacdintiisu waxa ay sababsatay naftiisa.

▣ “aad u fiiriyey” Luukos ereygan aadbuu u jecelyahay (cf. Luukos 4:20; 22:56; Acts 1:10; 3:4,12; 6:15; 7:55; 10:4; 11:6; 13:9; 14:9; 23:1). Istefanos waxa uu u eegay sida ay samayn jireen Yuhuuddu marka ay tukanayaan, laakiinse halkii uu ka tukan lahaa, Ilaah waxa uu isaga u oggolaaday inuu ku arko isaga janada.

▣ “wuxuu arkay ammaanta Ilaah” fiiro u yeelo iyada oo Istefanos aanu sheegin isaga oo arkay Ilaah, laakiin uu arkay ammaantiisa. Ma jiro qof Ilaah arka oo noolaada (cf. Baxniintii. 33:20-23). Ayuub waxa uu rumaysnaa inuu Ilaah arki doono (cf. Ayuub 19:25-27; Fal 7:55). Ciise waxa uu ballan qaaday in maalin uun kuwa qalbigoodu saafiga yahay uu arki doono Ilaah (Matayos 5:8). Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:13.

▣ “Ciise oo midigta Ilaah taagan” Ciise oo jooga gacanta midig ee Ilaah waxa weeyi luqada shabahaad ah (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:33) waxayna tusinaysaa awoodda ilaahnimada.

Xaqiiqada ah Ciise oo taagan waxa ay muujinaysaa isaga oo danaynaya Masiixiyiinta shahiidkoodii ugu horreeyay. Ilaah waxa uu naftiisa u muujiyay Istefanos isaga oo tusinaya inuu aqbalayo. tan ujeedadeedu maaha

1. in janadu ay samada jirto
2. in Ilaah uu ku fadhiyo carshi.

Waxa loogala jeedaa tusitaanka daryeelka Ciise iyo danayntiisa. Waa in aan ka taxadirno shabahaadda dhaqanka ah ee keeni keeni karta caqiido. Akhristayaasha casriga ah ee reer galbeedku waxay isku dayaan in aayado kastay ay ka raadiyaan macnaha tooska ah si ay tusiyaan kalsooni lagu qaato Kitaabka. Ilaah si runa ayuu dadkiisa isugu muujiya makhluuqaadka laakiin maaha si la mida aragtida dhulka laga yaqaano taasi oo ay fahmi karaan. Hubaashi waxa jirta meel lagu noolaado. Aadanaha leexdayna maaha kuwo si buuxda u fahmi kara boqortooyada ruuxiga ah. Ilaahna waxa uu doortaa waxyaalo dhaqan ahaan iyo khibrad ahaan uu inagula xidhiidhi karo. Waxyaalahani waa run mana aha wax la wada fahmi karo.

7:56 “Wiilka Aadanaha” Istefanos waxa uu Ciise ku tilmaamayaa “Kan xaq ah” ee 5:52. Dhegaystayaashiisa ma dhaafi doonto qiritaankan ku saabsan Masiixa. ereyga “wiilka aadanaha” waxa uu leeyahay labo adeegsi oo ah Axdiga Hore:

1. waxay ahayd erey caadi ah oo qof lagu magacaabo (cf. Yexesqeel. 2:1; Sabuurka. 8:4)
2. waxa loo adeegsaday qof ilaahi ah (i.e., Messiah) sida ku sugan Daanyeel 7:13-14 iyo Sabuurka. 110:1.

Haddaba, waxa ay la xidhiidhaa aadanaha iyo ilaahnimada labadaba. Tani waa sababta uu Ciise uu naftiisa uugu magacaabay iyo sidoo kale waxa ay ahayd magac aanay adeegsanin rabbaaniyuuntu iyaga oo magacyada Axdiga Hore u adeegsan jiray arrimo la xidhiidha dhalasho iyo milatari. Marjican uu adeegsanayo Istefanos waxa uu yahay mid ka mida labo adeegsi oo weedhan dhexdeeda kaga baxsan ereyadii Ciise (cf. Yooxanaa 12:34).

7:57-58 dhegaystayaashani waxay rumaysnayeen in Istefanos uu aflagaado geestay isaga oo sheegay in Ciise uu yahay Wiilka Aadanaha ee imanayo (cf. Daanyeel. 7:13). Muwaxdiintan (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:39) Yuhuudda middani waxay ahayd mid ku adag! Waxa ay Istefanos ku sameeyeen wixii Muuse uu ka dhigay aflagaado (cf. Laawiyiintii. 24:14-16; Sharciga Kunoqoshadiisa. 13:9; 17:7). Qiritaanka Istefanos waa run ama aflagaado kasbanaysa dhimasho! Ma jiri karaan waxyaalo dhex dhexaad u ah waxayaalaha uu sheegtay Ciise (cf. Yooxanaa 14:6-9).

7:57 “iyagoo isku wada qalbi ah ku yaaceen isagii” tani waa ereyo uu hore u adeegsaday Luukos isaga oo tilmaamaya midaysnaanta xerta (cf. 1:14; 2:46; 5:12; 15:25). Sanhadriinku waxay ku midoobeen cadho iyo diiditaanka Istefanos (sidoo kale eeg 18:12, halkaasoo Yuhuudda Achaia ay diideen Bawlos iyo 19:29 cadhada jaahiliintii Efesos ee kasoo horjeeday Masiixiyiinta).

7:58 “Markaasay intay magaalada ka soo saareen” Yerusaaalem dhexdeeda cid laguma dili jirin maxaa yeelay waxay ahayd meel quduus ah.

▣ **“dhagxiyeen”** waxa la sheegay in Yuhuuddii hoos joogay Roomaanku aanay xaq u lahayn inay fuliyaan ciqaab. Tani waxa ay tusinaysaa haddaba inaanay markasta run ahayn. fawdada degdegga ah cidina ma istaajin karto.

▣ **“nin dhallinyaro ah oo la odhan jiray Sawlos”** xagga dhaqanka Yuhuudda qofka waxa dhallin yaro la xisaabin jiray ilaa inta ka hoosaysa 40 sano. Tani waa meesha ugu horraysa ee aan kula kulmayno Saloskii reer Tarsus oo magaciisu markii danbe noqday Rasuul Bawlos. Bawlos waxa uu maqlay Istefanos oo Axdiga Hore ku samaynaya baadhitaan waxaana suurto gala inuu mar hore ku maqlay Sunagooga Yerusaaalem (6:9). Waxa qof uu la yaabi karaa haddii halkan uu Sawlos ku bilaabay shaki, isaga oo hore isugu dayi jiray inuu silciyo Masiixiyiinta.

7:59 “Rabbi Ciisow, ruuxayga qaado” waa fal amar ah. fiiro u yeelo iyada oo Istefanos uu rumaystay inuu tegayo samada isaga oo la jiraya Ciise (cf. II Korintos. 5:6,8) oonu tegaynin haadees (i.e., meel lagu hayo kuwa dhintay oo la mida midda Cibraaniga ah ee *sheol*, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:27). Istefanos waxa laga yaabaa inuu markhaati ka ahaa isku tallaab ku qodbitaankii Ciise, ama ugu yaraan uu si faahfaahsan wax uuga maqlay

maxaa yeelay waxa uu adeegsanayaa labo weedhood oo isku mid ah (i.e., aayadaha. 59 iyo 60, cf. Luukos 23:34,46).

Waxa xiiso leh iyada oo loo fiirsan karo in Istefanos uu baryayo Ciise sida xertuba ku sameeyeen 1:24. Si kastaba ha ahaatee, inta soo hadhay Axdiga Cusub baryada waxa loo sameeyay Aabbaha iyada oo lagu samaynayo magaca Wiilka.

7:60 “Markaasuu jilba joogsaday” dhagxintu hadiyo goor may ahayn khibrad lagu degdego. Macnahana waxa laga dhadhansanayaa iyadoo ahayd daqiiqado gudohood.

▣ **“oo cod weyn ku qayliyey”** waxa sidan oo kale sameeyay Ciise. Ereyadani wax waynbay u ahaayeen dadka badan iyo YHWH. Waxay middani ay taabatay maqalka Sawlos.

▣ **“ayuu dhintay”** tani waxay tusinaysaa dhimashadiisa isagoo naftu ka baxday (ex. Ayuub 3:13; 14:12; Sabuurka. 76:5; II Samuu’eel. 7:12; I Boqorradii. 2:10; Yeremyaah. 51:39,57; Daanyeel. 12:2; Matayos. 27:52; Yooxanaa 11:11; Fal 7:60; 13:36; I Korintos. 15:6,18,20; I Tesaloniika. 4:13; II Butros. 3:4). Tani ma tusinayso caqiiqada “seexashada nafta.”

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraaga waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Waa maxay ujeeddada hadalka Istefanos?
2. Maxaa Yuhuudda ku saabsan ee ay tusinayaan?
3. Maxay u cadhoodeen?
4. Sidee Ciise uu ula mid ahaa Muuse, aayadda 37?
5. Maxay xigashada ka ahaatay Ishacyaah 66:1-2 ee aayadaha 49-50 uu muhiim u yahay?
6. Maxay tahay muhiimmada ku jirta aragtida Istefanos ka arkayay Ciise?

FALIMAHA RASUULLADA 8

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Sawlos oo Silcinaya Kaniisadda	Sawlos oo Silcinaya Kaniisadda	Injiilka oo ku Faafaya Samaariya iyo Xeebta badda	Sawlos oo Silcinaya Kaniisadda	Dhagxintii Istefanos, Sawlos oo Silciye ah.
8:1b-3	8:1-3	8:1b-3	8:1b-2 8:3	(7:55-8:3) 8:2 8:3
Njiilka oo lagu Wacdiyey Samaariya	Dadkii oo lagu Wacdiyey Masiixa Samaariya gudaheeda		Njiilka oo lagu Wacdiyey Samaariya	Filibos oo Samaariya jooga
8:4-8	8:4-8	8:4-8	8:4-8	8:4-8
	Mihnadda Rumaysadka Saaxiriinta			Simoon Sixirroolihii
8:9-13	8:9-13	8:9-13	8:9-13	8:9-13
	Dembigii Sixirroolaha			
8:14-24	8:14-24	8:14-24	8:14-17 8:18-19	8:14-17 8:18-24 8:20-24
8:25	8:25	8:25	8:25	8:25
Filiboy iyo Itoobiyaankii Henook ahaa	Injiilka oo lagu Wacdiyey nin Itoobiyaan ah		Filiboy iyo Sarkaalkii Itoobiyaanka ahaa	Filiboy oo Baabtiisaya Henook
8:26-33	8:26-40	8:26-40	8:26-30	8:26-33
8:34-40			8:31-33 8:34-37 8:38-40	8:34-40
8:1b-3				

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: AAYADDA: 8:1a

¹Sawlosna raalli buu ka ahaa diliddiisa

8:1 “Sawlosna raalli buu ka ahaa diliddiisa” erayadani waxa ay gebagabaynayaan cutubka 7. Waa fal aan ebayn ahayn. Bawlos arrintan si wayn ayuu u xusuusnaa isagoo aad uuga xun (cf. Fal 22:20; I Cor. 15:9; Galatiya. 1:13,23; Filiboy. 3:6; I Timoteyos. 1:13). Qaar ayaa qaybtan la xidhiidhinaya 26:10, halkaasoo Bawlos uu ugu codeeyay Senhadriinka dhexdiisa in Masiixiyiinta la laayo.

NASB (UPDATED) TEXT: AAYADDA 8:1b-3

^{8b}oo maalintaas kiniisaddii Yerusaaalem ku tiil aad baa loo silciyey; oo dhammaantoodna rasuulladii mooyaane waxay ku kala firdheen dalalka Yahuudiya iyo Samaariya. ²Markaasaa niman cibaada leh Istefanos aaseen oo aad ugu baroordeen ³laakiin Sawlos aad buu kiniisadda u rafaadiyey, oo intuu guri walba galay, ayuu rag iyo dumarba ka soo jiiday, oo xabsi ku riday.

☐ **“oo maalintaas kiniisaddii Yerusaaalem ku tiil aad baa loo silciyey”** Tani waxa ay ugu dhawaan u taagan tahay wax-qabadkii hoggaamiyeyaasha Yuhuudda (sida ugu badan Suddukiinta) marka la eego koritaankii iskudhicii kaniisaddii Yedrsaalem. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxa ay sidoo kale ahayd habkii Ilaah ugu qasbayey in ay hir geliyaan sida ku qoran Fal 1:8! Haddii kale 1:8! Dabadeedna 8:1!

Ma aha wax shil ahaan ku yimid ereyga Luukos isticmaalayo *ekklesia* (Ka eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11) ee ku aaddan jidhka cusub ee rumaystayaasha. Raggan iyo haweenkan uma aysan arag in iyagu ay reeban yihiin ama aysan lahayn Ilaah ballamadiisii Axdigii Hore, laakiin xagga fulinta! Ereyga waxaa lagu dhex iksticmaalay Septuagint-ga iyadoo lagu tarjumayo “ururka” (MT *-qahal*) reer Israa’iil (cf. Fal 7:38); hadda waxaa loo isticmaalayaa isweheshiga rumaystayaasha jooga Yerusaaalem.

Luukos waxa uu ka helaa ereyga “Weynaan” (*megas*). Injiilkiisa dhexdiisa waxa uu ku isticmaalay shan iyo labaatan iyo sagaal iyo labaatan jeer Falimaha Rasuullada. Cutubka 8aad waxa uu ku isticmaalayaa:

1. Silcin weyn, aayadda. 1
2. baroorasho weyn, Aayadda. 2

3. Cod weyn, aayadda. 7
4. Qod weyn, aayadda. 9
5. Tan ugu weyn, aaydda. 10
6. Mucjisoooyin waaweyn, aayadda 13

▣ **“oo dhammaantoodna rasuulladii mooyaane waxay ku kala firdheen dalalka”** Waa mid aad u xiiso badan in silcinta laga reebay rasuullada oo si ballaadhan loogu degay Yuhuuddii ka timid Giriikka ee Masiixiyiinta ahaa. Sida meeshan ka cad rasuulladu waxa ay weli ku qanacsanaayeen in ay la joogaan nidaamkan Yuhuudda. Dhacdadani waxa ay dhacday waqti ka dambeeyay markii ay Ciise kula kulmeen Galiili sida ku jirta (Matayos 28:18:20) tanoo ayahd in ay sugaan imaatinka Ruuxa Qudduuska ah, oo intaas ka hor ay wacdiga ka wadaan Yerusaaalem iyo inta ku dhow.

▣ **“ku kala firdheen dalalka Yahuudiya iyo Samaariya”** Tani waa fulintii Luukos shaqadiisii weynayd sida ku jirta Fal 1:8. Markan waqti ayaa laga joogaa markii uu Ciise ku hadlay ereyadan sida cadna silicu waxa uu ahaa jidka keliya ee ay kaniisaddu ku aadi lahayd adduunka oo dhan. Kaniisaddu weli middan waa ay ka leexleexanaysaa!

8:2 “Markaasaa niman cibaada leh Istefanos aaseen” Ereyga “cibaado leh” waxaa aalaaba loo adeegsan jiray Yuhudda dareenka ruuxigaa leh (cf. Luukos 2:25). Waxaa macquul ah in tani ay la xidhiidho Yuhuud Masiixiyiin ah ama Yuhuud aan raacsanayn ama diidday xeerarka aan sharciga ahayn (tusaale ahaan sida qalalaasaha dadka badan) iyo dilka Istefanos. *Mishnah* waa uu fasaxayaa aasidda kan diinta afxumada u gaystay, laakiin aan loo samayn taciyo iyo baroorasho aad u weyn oo ay sameeyaan kuwaa isaga aasaya. Nimankan cibaadada lahu si bayaan ah ayey uga cadhoodeen

1. Diidmo toos ah oo ah oo ku saabsan wixii dhacay
2. In wixii dhacay ayan tixraac la lahayn oo aan si guud ahaaneed bandow loo saarin

8:3 “Sawlos aad buu kiniisadda u rafaadiyey” Ereygan falka ah waa fal-dhexaad aan toosnayn oo wax caddaynaya. Waxa uu macnihiisu noqon karaa bilowga ficil dhacay waqti la soo dhaafday (cf. NASV, NASB, NJB) ama fal soo noqnoqonayey (cf. NKJV, NRSV, TEV).

Ereyga “ravavege” macnihiisu waxaa weeye “in la dillaaciyo jidhka xawayaanka.” Waxaa lagu dhex adeegsaday Septuagint-gii iyadoo loo isticmaalayo xawayaanka sida ku jirta Baxniintii 22:13; Sabuurrada 74:13 iyo jebintii ciidanka sida ku jirta Yeremyaah 28:2 iyo 31:18. Bawlos waxa uu si toos ah ula dagaallamayey runtii hadalkii Istefanos ku jirtay, oo waxa uu isku dayey in uu daboolo dareenkiisa gudaha isagoo si cadho leh u silcinaya kaniisadda. (cf. Fal 9:1,13,21; 22:4,19; 26:10-11; I Korintos. 15:9; Galatiya. 1:13; Filiboy. 3:6; I Timoteyos. 1:13)

Ka eeg Mawduuc Gaar ah 5:11

▣ **“intuu guri walba galay”** Weedhan waxaa loo fahmay labo hab:

1. Bawlos oo soo saaray halkii ay Rasuulladu booqdeen (cf. 5:42)
 2. Waxaa jiray dhowr guri oo kaniisado ahaa xitaa waqtigan hore ee Yerusaaalem dhexdeeda halkaasoo ay rumaystayaasha si joogto ah ugu kulmi jireen
- Masiixiyiintii hore waxa ay ku kulmi jireen
1. seynagogyada degaanka Sabti kasta
 2. Macbudka maalmaha gaarka ah ama xitaa maalmaha ugu waaweyn
 3. Meelo gaar ah ama guryo tirsan Axad walba

▣ **“ayuu rag iyo dumarba ka soo jiiday”** Ereygan waxaa loo adeegsaday Shayddaankii baabbi’inayey saddex meelood xiddigaha samada sida ku jirta Muujintii 12:4. Dhowr jeer ayaa lagu isticmaalay gudaha Falimaha Rasuullada (cf. 8:3; 14:19; 17:6). Bawlos waxa uu ahaa mid cadaw ah marka aad eegto xagga silcintiisa (cf. 26:10). Tani waa caddaynta ku jirta weedha “rag iyo dumarba.” Waxa uu kala gooyay qoysas rumaystayaal daacada ah oo uu xabsi geliyey oo uu xitaa qaarkood dilay (cf. 9:1,13,21; 22:4,19; 26:10,11; Galatiya. 1:13;23; I

Timoteyos. 1:13). Tan ayaa ah sababta uu markii dambe isugu yeedhay “ka qudduusiinta ugu wada yar” (cf. I Kointos. 15:9; Efesos. 3:8).

NASB (UPDATED) TEXT: 8:4-8

⁴Haddaba kuwii kala firidhsanaa, meel walba oo ay mareenba hadalkii bay ku wacdiyeen. ⁵Markaasaa Filibos wuxuu tegey magaalada Samaariya, oo wuxuu dadka ku wacdiyey Masiixa. ⁶Oo dadkii badnaa, iyagoo isku wada qalbi ah, ayay dhegaysteen wuxuu Filibos ku hadlay markay waxyaalahaas maqleen oo ay arkeen calaamooyinkuu sameeyey. ⁷ Waayo, kuwo badan oo jinniyo wasakh leh qabay, jinniyadii oo cod weyn ku qaylinaya ayaa ka soo baxay, oo kuwo badan oo curyaan ahaa iyo laangadhayaashiiba waa la bogsiiyey. ⁸ Magaaladaasna aad baa looga farxay.

8:4 “kuwii kala firidhsanaa, meel walba oo ay mareenba hadalkii bay ku wacdiyeen ” Xusuusnow kuwani amysan ahayn Rasuulladii maxaa yeelay iyagu Yeruusaalem ayey ku hareen, Laakiin waxa ay ahaayeen Yuhuuddii Qurbajoogta ahayd ee Masiixiyiinta ahaa ee dhulalka lagu firdhiyey kuwaasoo noqday wacdiyeyaashii ugu horreeyay. Waa wax cajiib ah in shaqasii kaniisadda ee Adduunka oo dhan ay bilaabeen Istefanos iyo Filibos, laakiin aysan Rasuulladu bilaabin. Marka la leeyahay “ereyga” waxaa dhab ahaantii loola jeedaa injiilka, laakiin sidoo kale adduunka lagu daray awgii, kuwii aan Yuhuudda ahayni waxa ay diiradda saareen Istefanos (Shaqadii Weynayd 1:8; Matayos. 28:18-20; Luukos 24:47).

8:5 “Filibos” Waa mid ka mid “toddobadii” lagu sheegay gudaha 6:5 (cf. 21:8-9). Waxaa isaga lagu dhex sheegay saddex qaab wacdineed: (1) Samaariya (2) henook kii Itoobiyaanka ahaa iyo (3) adeeggii ka socday degaannada xeebta Falastiin.

▣ **“wuxuu tegey magaalada Samaariya”** Waxaa jirta su’aal xagga qoraal gacmeedka ah oo ku saabsan in akhrisku sheegayo ama odhanayol “magaalada Samaariya” ama “Magaalo Samaariya.” Qoraal gacmeedku waxa uu sheegayaa qodob cad [sida “the” Afka Ingiriisiga] tusaale ahan ka eeg (cf. MSS, P74, !, A, B). Arrintu si kastaba ha ahaatee, waqtigan isaga ah magaaladsn magaca Samaariya looma aqoon, laakiin waxaa loo yiqiin Sebaste. Xilligii Roomanka ereyga Samaariya waxaa loo adeegsan jiray sida ereyga degmo oo kale. Magaalada ugu weyn Samaariya waxa ay ahaan lahayd markaas Shekem, oo kaddib lagu magacaabay Niyaaboolis, maantana la yidhaahdo Nablus. Waxaa aragti ahaan jirtay in laga yaabo in magaaladani ay ahayd Gitta, maxaa yeelay waa magaalada uu hidda iyo dhaqan ahaanta u leeyahay Siimon Magus Aragtidani waxa ay ka timid Justin Martyr, oo isagu sidoo kale ka soo jeeda magaaladan.

▣ **“ oo wuxuu dadka ku wacdiyey Masiixa”** Dadka reer Samaariya Yuhuudda ayaa necbayd sababtoo ah waxa ay u tixgelinayeen Kuwo la yaso (cf. Cesraa 4:1-3).

Tani waxa ay la xidhiidhaa masaafurintii Aasiiriya ee 722 B.C. kuwaasoo ku tarmay dhulkii waqooyi oo ah Toban Qabiilo oo aan diin lahayn kuwaasoo ay is guursadeen Yuhuddii yarayd ee hadhay (cf. II Boqorrada 17:24-41).

Dadkan iyaga ah Ciise waa uu u adeegay. Ciise waxa uu inuu Masiixa yahay u muujiyey haweenaydii reer Samaariya iyo xaafaddii ay degganayd (cf. Yooxanaa 4). Markan Filibos waxa uu wacdi ku bixinayaa “Masiixa” (qodob sife ah oo wax caddaynaya), oo tarjumaadda Giriigga ku ah sidoo kale “Masiixa” (ka eeg Mawduuc Gaar ah 2:31). Magaca ku jira Axdigii Hore ee la xidhiidha YHWH ballantiisii ahayd in uu soo dirayo Mid dhisaya boqortooyo cusub, oo si guud ahaaneed isu bari doona faca cusub ee Ruuxa. Dhacdadani waxa ay muujinaysaa adeeggii Ciise gaar ahaanna waxayna gaar ahaan awood ku bixinayaan oo laga arkayaa sidii ku jirtay ereyadii gunaanadka ahaa ee Ciise (1:8).

8:6 “dadkii badnaa, iyagoo isku wada qalbi ah” Weedha “One accord” “Isku wada qalbi ah” waa mid aad loogu yaqaan Luukos. Ka ee Tasmada 1:14.

▣ “markay waxyaalahaas maqlen oo ay arkeen calaamooyinkuu sameeyey” Tani waxa ay la xidhiidhaa mucjisooyinka sida ay farriinta Filibos caddaynayso (cf. v. 7). Caddaymahan isku nidka ah ee Ruuxu waxa ay isku xidhayaan Ciise, Labo iyo tobankii, Toddobaatankii, iyo wacdigii Butros iyo Yooxanaa.

8:7 Lahaashada jinku waa run ka dhex jirta adduunkeennan aan joogno (cf. Merrill F. Unger’s two books: [1] *Biblical Demonology* and [2] *Demons in the World Today*). Ka eeg labada Mawduuc ee Gaarka ah ee 5:16.

NASB (UPDATED) TEXT: 1:1-6

¹Waxaa warqaddan qoraya Bawlos oo ah addoonkii Ciise Masiix, oo loogu yeedhay inuu rasuul ahaado, oo gooni looga dhigay injiilka Ilaah. ²Injiilkaas ayuu Ilaah markii hore nebiyadii ku ballan qaaday xagga Qorniinka qoduuska ah, ³oo wuxuu ku saabsan yahay Wiilkiisa, kii ka dhashay farcankii Daa’uud xagga jidhka. ⁴oo sarakiciddii uu ka sal-a kacay kuwii dhintay ay ku caddaysay inuu xagga ruuxa qoduusnimada yahay Wiilka Ilaah oo xoog leh oo ah Rabbigeenna Ciise Masiix, ⁵kan aannu ku hehlay nimco iyo rasuulnimo, inaannu addecidda rumaysadka magiciisa daraaddiis ugu geeyno quruumaha oo dhan. ⁶Idinkuna kuwaas dhexdooda aad ku jirtaan oo ah kuwii loo yeedhay oo Ciise Masiix.

8:9 “nin Simoon la odhan jiray” In ninkani rumaysnaa (cf. vv. 13,18) iyo in uu ahaa mid iska dhigdhiigaya oo awood raadinaya ma kala cadda. Waxaan jieclaan lahaa in aan siiyo faa’idada shakiga ee ku salaysan aayadda. 24. Waa wax layaab leh inta dhaqan ee ay kaniisaddii hore ay Horumar kaga gaadha ninkan, laakiin dhammaanteed waa malo (cf. *The Zondervan Pictorial Encyclopedia of the Bible*, vol. 5, pp. 442-444).

▣

NASB, NRSV	“Falfal”
NKJV, TEV	“sixirka”
NJB	“qaabka sixirka”

MAWDUUC GAAR AH: MAGIC

Waqtiyadii hore waxaa soo if baxay in ay jireen dhowr nooc oo shaqsiyaad iyo kooxo ah oo ku lug lahaa noocyo kala duwan oo sixirka ah.

1. Waxaa jira mid sida wadaad u eg, oo ka yimid Medea oo ku lug lahaa cilmiga xiddiginta oo la odhan jiray Chaldeans (cf. Daanyeel. 1:20; 2:2,10,27; 4:7,9; 5:11; Matayos. 2:1,7,16). Herodiyiintu waxa ay isga ugu yeedhi jidheen “Wadaaddada reer Midyaan.” Waxa ay ku lug lahaayeen in ay wax-ka-sii-sheegidda iyo ilaalinta dhacdooyinka mustaqbalka ee ku saabsan dhaqdhaqaaqa iyo is qaabaynta ilaahyada xiddigaha ah (tusaale ahaan, meerayaasha, xiddigaha, ururta, xiddigta qorraxda ku dul wareegta).
2. Waxaa jirta koox ku shaqaysa, falsafada, xisaabta oo Giriig ah oo loo yaqaan Pythagorians
3. Kooxaha ugu badan ee sixirku waxa ay ka kooban dad iyagu ku andacooday in ay awoodo ku haystaan awoodda sare ee dabeecadda ama xoogagga dabiiciga (cf. Bilowgii. 41:8,24; Baxniintii. 7:11,22; 8:7,19; 9:11). Aalaaba awoodahan (ama ilaahyadan) waxaa loo arki jiray in ay diriri kala dhexaysa aadanaha oo sidii loo qaadan lahaa awooddan ama awooddaasna, uu kan cilmigaa lahi uu si gaar ah u maammulayo xooggaas ama awooddaas. (cf. the magical papyri of the third and fourth centuries A.D.). Shaqsiyaadkani waxa ay ahaayeen:
 - a. Saadi dhacdooyinka mustaqbalka
 - b. Maammul dhacdooyinka mustaqbalka
 - c. Fasir dhacdooyinka iyo riyoooyinka
 - d. Habaar ama difaac dhaqsiyaadka kale, magaaloooyinka, quruumaha, ciidammada, IWM

4. Sida ku jirta Fal 8:9,11 sixirrooleyaashu waxa ay ku doodeen in ay awood u leeyihiin in ay xoog ku maammulaan xoogga aan shaqsiga ahayn ito kan shaqsiga ah (iyagoo jin adeegsanaya) si ay doonistooda u hirgeliyaan. Tan waxaa had iyo jeer ku jiray soo bandhigga waxyaabaha sixirka ah.
- 5 “Waa run” saaxiriintu waxa ay had iyo goor weerari jireen saaxiriinta kale ee fulin waaya soo bandhigga iyo wax u fulinta sida tooska ah. kuwan oo dhammi waxa ay ahaayeen matalayaal iyo qiyaanooleyaal (cf. Fal 13:6,8; 19:13).
6. Awoodda Injiilka waxaa lagu arkay adeeggii Bawlos ee gudaha Efesos halkaasoo ay saaxiriintii hore ku baddalmeen oo ay ku rumaysteen Ciise Masiix oo ay ku gubeen bugaagtoodii sixirka ee qaaliga ahaa. (i.e., sida loo falo sixirka iyo waxyaalaha la xidhiidha, cf. Fal 19:19).
7. Wax aqrin dheeraad ah
 - a. Susan Garrett, *The Demise of the Devil*, Fortress Press, 1989
 - b. Merrill Unger, *Biblical Demonology*, Scripture Press, 1967
 - c. Hendrik Berkhof, *Christ and the Powers*, Herald Press, 1977
 - d. Waller Wink, *Naming the Powers*, Fortress Press, 1984
 - e. Clinton Arnold, *Three Crucial Questions About Spiritual Warfare*, Baker, 1997

8:10 “Ninkanu waa xooggii Ilaah oo la odhan jiray Weyne” Kani waxa uu ahaa magaca ilaaha ee Giriigga iyo Roomaanka ee lagu magacaabi jiray Pantheon (i.e., Zeus). Luuqadda Aramaygga waxa ay ku tahay “Tani waa awoodda ilaaha loogu yeero weyne.” Ninkanu wuxuu si guud ahaaneed u qiyaanay dadkii degaanka. Oo wuxuu sidoo kale qiyaanay naftiisa (cf. vv. 9,13).

8:12 “rumaysteen” Ka eeg Mawduuca Gaarka ah: Rumayn, Iimaan, aamminid ee ku jirta 3:16 iyo Axdigii Hore Rume ee ku jirta 6:5.



NASB “ku wacdinta warka wanaagsan”
NKJV “ku wacdinta waxyaabaha”
NRSV “faafinayey warka wanaagsan”
TEV “farriin ku saabsan warka wanaagsan”

Euangelizō waa erey ficil ah Giriig ah oo ah labo ereyo oo la siku xidhan (eu) wanaagsan iyo fariin (*angelizo*). Ereyada Nigiriisiga ah ee evangel, evangelize, iyo evangelism waxa ay ka yimaadeen ereygan Giriigga ah. Filibos waxa uu sheekada Ciise u soo ban dhigay kuwan reer Samaariya waxayna uga jawaabeen rumaysad badbaado leh.

▣ **“ku saabsan boqortooyada Ilaah”** Ka eeg labada Mawduuc ee Gaarka ah ee ku jira maadadan ee 1:3.

▣ **“Magaca Ciise Masiix”** Ka eeg Mawduuc Gaarka ah ee 2:21.

▣ **“Iyaga waa la baabtiisay”** Ka eeg Mawduuc Gaarka ah ee 2:38.

▣ **“Rag iyo dumar waa isku mid”** marka macnaha guud la eego waxaa jiri kara labo muhiimadood oo ku aaddan weedhan.

1. Bawlos waxa uu silciyay “rag iyo dumar (cf. 8:3),” laakiin injiilku “rag iyo dumarba” waa uu badbaadinayey
2. Nidaamka Yuhuudda ninka oo qura ayaa ka qayb gelayey Bilowga isu imaadka gudniinka Yuhuudda, laakiin markaan sida ku jirta injiilka rag iyo dumarba waa ay ka soo qayb gaeleen bilowga kulanka baabtiiska.

8:13 “Simoon qudhiisuna waa rumaystay” Gaadh siiyeyaasha warka wanaagsanu waxa ay ereygan “rumaysad” (K Mawduuca Gaarka ah ee 3:16) qaab dareen aad u muuqda, laakiin waxaa jira meelo ka mid ah Axdiga Cusub (tusaale ahaan, Yooxanaa 8:31) oo loola jeedo wax ka yar is beddel (cf. Yooxanaa 8:59).

Rumaysadka ugu horreeya oo qura ma aha ujeedku (cf. Matayos. 13:1-9,10-23; 24:13). Sii wadista iyo addeecista ayaa waxay sidoo kale yihiin caddaynta xidhiidhka runta ah ee lala leeyahay masiixa.

MAWDUUC GAAR AH: DADAALKA

Way adag tahay in la qeexo madhab yada baybalka ee nolosha Masiixiyiinta maxaa yeelay waxaa loo muujiyey laho ahaan kuwo galbeedka ku xiran. Labadan hab waxaad mooddaa in ay iska hor imanayaan laakiin weli waa isla baybalkii. Masiixiyiinta Galbeedku waxay go'aansadeen in ay doortaan midh qura oo ay ka istaagaan tii kale ee taa liddiga ku ahayd. Bal aan sharraxaad ka dhiibo.

1. Badbaadadu ma go'aanka koowaad ee Masiixa la aamminaa, mise waa nolol lagaa rabo in aad weligaa xernimo u diyaar ahaatid?
2. Badbaadadu ma doorashaa halkii ay noqol lahayd nimco Ilaaha Weyn nooga timid mise rumaysadka iyo tawbadkeenka aadanaha ayaa u ah jawaab lagu helo deeqda rabbaaniga ah?
3. Ma hal mar baa la helaa badbaadada, oo macquul ma aha in la lumiyo, mise waxaa jirta baahi loo qabo in si joogto ah loo wado.

Arrintan dulqaadashadu waa mid weligeed ka soo dhex jirtay taariikhdi kaniisadda. Dhibaataadu waxa ay si toos ah uga bilaabanaysaa isku dhacyada qoraallada sida tooska ah isaga hor imanaya ee Axdiga Cusub:

1. Hubsashada qoraalka
 - a. Hadalladii Ciise (Yooxanaa 6:37; 10:28-29)
 - b. Hadalkii Bawlos, (Rooma 8:35-39' Efesos 1:13; 2:5,8-9; Filiboy 1:62:13; II Tesaloniika 3:3 II Timoteyos 1:12; 4:18)
 - c. Hadalkii Butros (I Butros 1:4-5)
2. Qoraallada loo baahan yahay in ay sii socdaa
 - a. Hadalladii Ciise (Matayos 10:22; 13:1-9,24-30; 24:13; Markos 13:13; Yooxanaa 8:31; 15:4-10; Muujintii 2:7,17,20; 3:5,12,21)
 - b. Hadalladii Bawlos Rooma 11:22; I Korintos 13:5; Galatiya 1:6; 3:4; 5:4;6:9; Filiboy 2:12; 3:18-20; Kolosay 1:23)
 - c. Hadalladii qoraagii Cibraaniyada (2:1; 3:6,14; 4:14; 6:11)
 - d. Hadalladii Yooxanaa (I Yooxanaa 2:6; II Yooxanaa 9)
 - e. Hadalka Aabbaha Muujintii 21:7)

Badbaadada Baybalku waxa ay ka soo baxdaa jacaylka, naxariista, iyo nimcada Ilaah weyn ee qaadirka ah. Ma jiro aadane badbaadi kara haddii aanu Ruuxa Qudduuska ahu ku toosin (cf. Yooxanaa 6:44,65). Barashada Kitaabka ayaa marka hore timaadda oo arrinta ayey hagaajisaa, laakiin waxay ku xiran tahay hadba sida aadanuhu uga jawaabo iimaanka iyo yawbad keenka, bilow ahaan iyo joogto ahaan labadaba. Ilaah wuxuu aadanaha kula shaqeyaa xiriir axdi leh. Ahmiyado iyo masuuliyado ayuu leeyahay labadaba oo ku jira!

Aadanaha oo dhan waa loogu deeqay badbaadada. Dhimashadii Ciise waxa ay la macaamishay dhibaataadii dembigii aadanihii dhacay. Ilaah waddo ayuu siiyey wuxuuna kuwa isaga araggiisa ka abuurin oo dhan ka doonayaa in ay gartaan jacaylkiisa iyo shaqadiisa weyn ee uu noogu qabtay Ciise Masiix.

Haddaad jeclaan lahayd in aad aqrisid in badna oo maaddadan ku saabsan adigoo wax jaraa oo madhabtra Calvin ah ka sugayn , ka eeg

1. Dale Moody, *The Word of Truth*, Eerdmans, 1981 (PP 248-365)
2. Howard Marshall, *Kept by the power of God*, Bethay fellowship, 1969
3. Robert Shank, *Life in the Son*, Westcott, 1961

Kitaabka Qudduuska ahu labo dhibaato oo kala wuan ayuu meeshan ku sheegayaa: In aad hubsashada u qaadatid sidii sharci wax kuu fasaxaya waa in lagu noolaado mro la'aan iyo nolol danaystenimo (2) iyo adigoo ku dhiirri gelinaya kuwaa iyagu la hardamaya hawsha iyo dembiyadooda shaqsi ahaaneed. Dhibaataadu waxaa weeye in kooxaha qaldani ay qaaadanayaan farriin qaldan oo ay sidaas hab qaab climiyeed aan fadhin ku

sameeyaan iyagoo qayb yar oo xadaysan oo Kitaabka ah. Masiixiyiinta qaar ayaa si aad u daran ugu baahan farriintan hubsashada, halka kuwo kale ay uga baahan yihiin digniino ad-adag! Kooxdee ayaad adigu ka tirsan tahay?

Waxaa jira taariikh fiqi ahaaneed oo ay isaga soo hor jeedaan Augustine iyo Pelaguis, iyo Calvin iyo Arminius (semi-Pelagain). Arrintan waxaa ku jirta su'aasha badbaadada: Haddii midi uu si run ah u badbaado, inyeysan waajib ku ahayn in uu rumaysad iyo midho-dhal ku dadaalo?

Kaalfiniintu waxa ay gadaal isga xiraan ama iska dhigaan qoraallada baybalka ee kala saaraya qaaddirnimada Ilaah iyo ilaalinta awoodda (Yooxanaa 10:27-30; Rooma. 8:31-39; I Yooxanaa 5:13,18; I Butros. 1:3-5) iyo ereyga falsameeyaha ah ee la midka ah falka tegahy ee aan toosnayn eek u jira Efesos. 2:5,8.

Arminiyiintu waxa ay gadaal isga xiraan ama iska dhigaan qoraallada baybalka ee rumaystayaasha uga digaya in ay wax "qobtaan," "sii daayaan," ama ay "sii wadaan" (Matayos. 10:22; 24:9-13; Markos 13:13; Yooxanaa 15:4-6; I Korintos. 15:2; Galatiya. 6:9; Muujintii. 2:7,11,17,26; 3:5,12,21; 21:7). Anigu shaqsi ahaan ma rumaysni in Cibraaniyada 6 iyo 10 dhaqan galin ahaan loo qaadan karo, laakiin Arminiyiin badan ayaa waxa ay u isticmaalaan sida digniin ka soo hor jeedda dhabar u jeedinta. Masaalka beer goyska ee ku jirta Matayos 13 iyo Markos 4 waxa ay muujinayaan rumaysadka cad ee muuqda, sida ku jirta Yooxanaa 8:31-59. Halka Kaalfiniintu ay soo qaadanayaan ereyga falka ebyan ah ee ay u adeegsadeen in ay ku sharraxaan badbaadada, Arminiitu waxa ay soo qaadanayaan fal taagan sida I Korintos. 1:18; 15:2; II Korintos. 2:15.

Kani waa tusaale kaamil ah oo ku saabsan sida hababka fiqigu ay caayaan qodobka qoraalka cad ee tafsiirka. Aalaaba qodob hage ah ama madax qoraaleed ayaa la adeegsadaa marka la dhisayo isku xidhka fiqiga ee qoraallada kale oo dhan muujinaya. Ka taxadda isku xidhka meel kasta oo uu ka yimaado. Waxa ahy ka yimaadeen suuro gelinta reer galbeed, ee ma aha muujin. Baybalku waa kitaab reer bari. Waxa uu muujiyaa run ku jirta arrimo iska hor imanaya oo ay murgu ku dheehan tahay. Masiixiyiintu waa in ay u adkaystaan labadaba oo ay dhibkan ku dhex noolaadaan. Axdiga Cusub waxa uu muujinayaa labadaba ammaanka rumaystaha iyo amarka ah in uu sii wado rumaysadka iyo in uu u socdo si Ilaah raalli ka yahay. Masiixiyaddu waa jawaab celin bilow u ah tawbadkeenka iyo iimaanka oo ay la socoto jawaab tawbadkeen iyo iimaan aan joogsi lahayn. badbaadadu ma aha waxa la soo saarayo ama la samaynayo (sida tigidh jannada loo goosanayo ama caymiska dabdembaska), laakiin waa xidhiidh. Waa go'aan iyo xernimo. Waxa ay ku qeexan tahay erey kasta oo fal ah waqti kasta oo loo adeegsaday Axdiga Cusub dhexdiisa:

AORIST (ficil ebyamay), Fal 15:11; Rooma. 8:24; II Timoteyos. 1:9; Tiitos 3:5

PERFECT (ficil ebyamay oo ay natiijooyin socda wata) Efesos. 2:5,8

PRESENT (ficil socda), I Korintos. 1:18; 15:2; II Korintos. 2:15

FUTURE (dhacdooyin mustaqbalka ah, ama dhacdooyin jira), Rooma. 5:8,10; 10:9; I Korintos. 3:15; Filiboy. 1:28; I Tesloniika. 5:8-9; Cibraaniyada. 1:14; 9:28

☐ **“wuxuu la socon jiray Filibos”** Kani waa fal aan ebyanayn la soco is beddellada

1. wuu maqlay, aayadaha. 6-7,12
2. wuu arkay, aayadaha. 6-7,13
3. wuu rumaystay, aayadda. 13
4. waa la babaabtiisayptized, aayadda. 13
5. Filibos ayuu raacay, aayadda. 13

NASB (UPDATED) TEXT: Aayadaha 8:14-24

¹⁴Haddaba markii rasuulladii Yeruusaalem joogay maqleen in Samaariya hadalkii Ilaah aqbashay. ayay waxay u soo direen Butros iyo Yooxanaa, ¹⁵kuwaasoo markay yimaadeen, u duceeyey iyaga inay Ruuxa Qoduuska ah helaan; ¹⁶maxaa yeelay, midkoodna weli kuma uu soo degin; laakiinse magaca Rabbi Ciise oo keliya ayaa lagu baabtiisay. ¹⁷Markaasay gacmahooda saareen, oo waxay heleen Ruuxa Qoduuska ah. ¹⁸Haddaba Simoon markuu arkay in markii rasuulladu gacmahooda saareen, waxaa la

siiyey Ruuxa Qoduuska ah, ayuu lacag u taagay, ¹⁹isagoo leh, Anigana i siiya xooggan in nin kastoo aan gacmahayga saaroba. uu helo Ruuxa Qoduuska ah. ²⁰laakiin Butros baa wuxuu ku yidhi, Lacagtaadu ha kula baabba'do, maxaa yeelay, waxaad u malaysay in hadiyadda Ilaah lacag lagu helo. ²¹Xaalkan kuma lihid ama qayb ama badh; maxaa yeelay, qalbigaagu Ilaah hortiisa kuma qummana. **22** Sidaas aawadeed xumaantaadan ka toobad keen. Rabbigana ka bari in fikirka qalbigaaga laga cafiyo. ²³Waayo. waxaan arkaa adigoo ku jira xameetida qadhaadhnimada, kuna xidhan xaqdarrada. ²⁴Markaasaa Simoon u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Rabbiga ii barya inaan waxyaalahaas aad ku hadasheen midkoodna igu dhicin .

8:14 “Haddaba markii rasuulladii Yerusaaalem joogay maqleen in Samaariya hadalkii Ilaah aqbashay. ayay waxay u soo direen Butros iyo Yooxanaa” Xilligii uu uu Masiixu noolaa xerta mamnuuc ayey ka ahayd in ay ka adeegaan Samaariya (cf. Matayos. 10:5). Rasuulladu waxa ay si weyn u doonayeen in ay oggolaanshoo guud ay siiyaan dhaqdhaqaaqan aan caadiga ahayn ee Ruuxa Qudduuska ah kooxdan sida dhaqan ahaaneed loo nacay. Degaankan waxaa si cad loogu dhe sharraxay Falimaha Rasuullada 1:18. Sida ay qayb ahaan ahayd, Filibosa waxa uu si labo iyo tobankii kale ka duwan u qabtay tilmaantii Ciise ee ahayd in adduunka oo dhan la gaadho.

Ogsoonow rumaysadka Ciise Masiix waxa uu la mid yahay “helidda Ereyga Ilaah.” Ereyga Ilaah waxa uu u taagnaan karaa dhowr waxyaalood.

1. gebi ahaanba xidhiidhka uu Ilaah la yeeshay aadanaha.
2. Xidhiidhka qoray ee uu Ilaah la leeyahay aadanaha (i.e., Qorniinka)
3. God’s Son Wiilka Ilaah (i.e., Ereyga cf. Yooxanaa 1:1) ee ah muujinta ugu dambaysa ee Ilaah (cf. Cibraaniyada. 1:3).

Xusuusnow in Butros iyo Yooxanaa la diray. Butros waxaa loo doortay inuu noqdo hoggaamiyaha xooda rususha ah Yooxanaa na in uu yahay kii ugu horreeyay ee rabay horraantii in uu dabka uu yeedho reer Samaariya (cf. Luukos 9:54).

8:15 “markay yimaadeen, u duceeyey iyaga inay Ruuxa Qoduuska ah helaan” waxaa jiray dhibaatooyin waaweyn oo ah in fiqi badbaadada ah Falimaha Rasuullada dhexdiisa laga sameeyo sababaha soo socda awgood: sida ay dhacdooyinka isugu xigaan iyo sida dhacdooyinka qudhoodu ay badbaada ku hareeraysan ugu kala duwan yihiin tuducba tuducda kale. Ruuxa Qudduuska ah, sida Bentakostiga, waxa uu muujinayaa in Ilaah aqbalay oo uu badbaadiyey reer Samaariya. Iyagu kuma aysan badbaadi lahayn heerka koowaad (i.e., ereyga “receive” ama helid waa fal ebyan oo heerka dhexe ah oo wax caddaynaya.) haddii aysan helin shaqada Ruuxa Qudduuska ah (cf. Rooma. 8:9).

Waxaan filayaa tusaalihii Bentakostiga laga arkay, ee uu Ilaah ku soo saaray koox kale oo degaan ahaan iyo xag jir ahaan ka duwan dadka kale, si uu ugu muujiyo ugu xaqiijiyo kaniisadda Yuhuudda ah ee rumaysadka leh in Ilaa qudhiisu uu si fuud oo buuxda u aqbalay koox cusub. Caddaynta Ruuxa ee ku jirta Falimaha Rasuullada (i. e., Pentecost) fiqi ahaan waa ay ka duwan tahay afalkii Korintos.

Qoraalkan looma adeegsan karo ha la sameeyo sidii ay Korintos samaysay si badbaadaada loogu xaqiijiyo (cf. I Korintos. 12:29-30, oo ah su’aalo is daba socda oo u baahan jawaabta ah “maya”). Luukos waxa uu diwaan gelinayaa wixii dhafacay, ma aha wax mar kasta dhici doonay.

8:16-17 Tani waa ay ka duwan tahay amarka dhacdooyinkii lagu dhex sheegay Falimaha Rasuullada 2:38. Kala duwanaanshuhu waxaa weeye ficilkii gaarka ahaa ee Ruuxa Qudduuska ah: (1) sida ku jirta 2:38 waxa ay la xidhiidhaa badbaadada (2) sida ku jirta 8:16 waxa ay la xidhiidhaa habkii Bentakostiga ee la soo maray. Isla “dhacdadii Ruuxa Qudduuska ah” ee Falimaha Rasuullada cutubka 2 markan reer Samaariya dhexdooda ayey ka dhacay. Tani ma ahayn faa’idooda oo keliya, laakiin sida ugu badan bulshada Masiixiyiinta Yuhuudda ah. Waxa ay u muujisay in Ilaah uu si buuxda oggolaaday dadkii reer Samaariya! Tani ma aha in la xoojinayo labo badbaado oo bilow ah oo la soo maray.

Fadlan ogsoonow in Butros iyo Yooxanaa ay ahaayeen kuwii ogaysiiyey caddaynta gaarka ah ee Ruuxa ee ay soo mareen maalintii Bentakostiga. Tani ma tilmaamayso in calaamadihii mucjissada lahaa ee la socday wacdigi

Filibos aysan ahayn muujinnada run ah ee cad ee Ruuxa (cf. v. 13). Butros iyo Yooxanaa waxa ay doonayeen Bentkosti reer Samaariya! Tania ad ayey muhiim u tahay maxaa yeelay markii Korneliyos uu sidan oo kale soo arkay (i. e., Fal 10) Butros waxa uu ogaa in Ilaah aqbalay ama oggolaaday ninkii milatariga Rooma ahaa iyo goyskiisa. Injiilku dadka oo dhan ayuu u ahaaday. Tani waa runta weyn ee ay waayo-aragnimada ama wixii la soo maray ee ku jira Falimaha Rasuullada ay muujinayso!

8:16 Tani waxaa magaceedu ahaa Bentakostigii reer Samaariya.

88:17 Tani qoraal caddayn ah uma noqon karto sida ay gacan saariddu ay lagama maarmaan u ahayd. Qodobka ku aaddan ujeedkan, mar kale ma dhacayo sida ku jirta Falimha Rasuullada. Ma caddaynayo awoodda iyo amarka Rasuullada. Mawduuc Gaar ah ka eeg: Gacan saaridda 6:6.

8:20 Su'aasha fiqi ahaaneed ee xaggeenu waa su'aasha ku aaddan Siimon. Miyuu badbaaday mise waa maya? Ereygii Burtos waxaa loo qaadan karaa habaar ama digniin. Rumaystayaasha cusub oo dhammi war-bixin laciif ah oo aan sax` ahayn ayey ka haystaan injiilk, laakiin miyey Siimon tilmaantiisu noqonaysaa ama caddaynaysaa mid ay danaystennimo ka muuqato amaba ah? Miyey dadku ku badbaadayaan iyagoo mudnaano isku dhac ay naftooda ku jirto?

▣ **“hadiyadda Ilaah”** Halkan Ruuxu waxa uu u taagan yahay shaqada Ilaah oo dhan isagoo u hadlaya aadanaha dembiga badan ee fallaagada ah (cf. Ishacyaah. 55:1-2; Yeremyaah. 31:31-34; Yexesqeel. 36:22-38; Luukos 11:13; Fal 2:38).

8:21 “Xaalkan kuma lihid ama qayb ama badh” Ereyga ugu horreeya “qayb” (i.e., meris) macnihiisu waa badh sida guud. Soo jeedin diidmo ah ayey ku bixinaysaa halkan siyo ida ku jirta II Korintos. 6:15.

Ereyga xiga ee “badh” (i.e., *klēros*) waa erey ku jira Axdigii Hore oo ah “xidhmo,” oo ahayd habkii ay u qaateen doonista Ilaah (i.e., *Urim iyo Thummin*). Waxaa loo adeegsaday in Dhulkii Ballan0qaadka so soocdo quruumaha dhexdooda (cf. Yashuuca. 12-19). Sidaas daraaddeed, waxaa loo adeegsanayaa qaab dhaxal ahaaneed. Ereygan waxa uu Luuqadda Ingiriisiga ku noqday in loo isticmaalo “clergy,” ama “wadaad,” laakiin Axdiga Cusub dhexdiisa waxa ay u taagan tahay rumaystayaasha oo dhan.

▣ **“qalbigaagu Ilaah hortiiisa kuma qummana”** Waxaa laga yaabaa in tani ay tahay tixraaca ku jira Sabuurrada 78:37. Ereyada “qummanaan” iyo “aasaas” (Ka eeg Mawduuca Gaarka ah: 3:14) iyo hababkooda kala duwan, waxa ay ka yimid erey loo adeegsado geed toosan oo webiyada ka ag baxa oo laga helo Mosabotaamkiya. Waxa uu gaadhayaa shan iyo toban illaa labaatan dhudhun oo dherer iyo toosnaan ah. Ilaah waxa uu soo qaatay ereygan oo loo adeegsado dhismaha (isagoo eegaya toosnaanta dhereka sare ee derbiyada), si uu u caddeeyo dabeecadda uu asal ahan leeyahay. Ilaah waa hogvgaamiyaha aan is beddelin een waxba ka dambayn ee xukumaya aadanaha oo dhan. Sida ay middani u caddahay, dhammaan tijaabadii ayey ku dhaceen (cf. Rom. 3:9-18,23).

8:22 “toobad keen” Kani waa fal amar tegay oo toosan, oo oo wax degdeg loo rabo tilmaamaya. Mawduuc Gaar ah ka eeg: 2:38

▣ **“bari”** Kani waa fal tegay oo aan toosnayn oo amar ah. In Ilaah lala hadlo waxa ay caddayn u tahay xidhiidh shaqsi ahaaneed, oo kalsooni ah, oo tawbadkeenka hor seeda, oo caddayn u ah ku dhex noolaanta ruuxa!

▣ **“in”** Tani waa jumlo shuruudeed heerka koowaad ah, oo uu qoraagu u adeegsanayo in uu ku muujiyo wixii uu filashada u lahaa ama uu doonayey. Sida ku jirta jumlada waxa ay tilmaamaysaa arrin aasaas u ah Siimon doonistiisii ahayd in uu tawbad keeno oo uu cafis baryo. Sida maankiisa ku jirta iyo ficilladiisu waa kuwo ka duwan atn Masiixiyadda caadiga ah.

▣ **“fikirka qalbigaaga lagaa cafiyo”** Dembigu fikirka nolosha ayuu ka dhex bilowdaa. Rabbaaniyiinktu waxa ay sheegaan in maanka qofku uu la mid yahay beer loo diyaariyay in midho lagu beero. Wixii aan indhaheenna

iyo dhegaheenna u oggolaanno in aan aragno oo aan maqalno ayaa xidid ku yeedhan ama ku beerma. Haddii aan u daynno in ay ku dhex noolaadaan, fikirradani si ficil ahaaneed ayey u soo baxayaan. Tan weeye sababta uu Axdiga Cusub noogu tilmaamayo “iska giijiya guntiga maankiinna” (cf. I Butros 1:13) ama “dib u cusboonaysiiya maankiinna” cf. Rooma 12:2; Efesos. 4:23).

8:23

NASB, NRSV “qadhaadhnimada cadhada”

NKJV “uu qadhaadh sumeeyay”

TEV “uu qadhaadh masayri ka buuxo”

NJB “qadhaadhnimo cadho”

Ereyada “cadho” (*cholē*) iyo “qadhaadhnimo” (*pikros*) labaduba waxa ay la xidhiidhaan ruuxa qadhaadh, oo had iyo goor la bah ah cadhada iyo jeedsashada (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa. 29:18; 32:28-33; Cibraaniyada. 12:15). Bawlos waxa uu ereyga “qadhaadh” dhowr jeer si shayo liis ku jira la isaga ilaaliyo (cf. Rooma. 3:14; Efesos. 4:31).

▣

NASB “kuna xidhan xaqdarrada”

NKJV “Xaqdarro xidhatay”

NRSV “Katiinadda sharka”

TEV “Maxbuuska dembiga”

NJB “Katiinadaha dembiga”

Waxaa laga yaabaa in tani ay tahay tilmaantii shaqadii Masiixa (cf. Ishacyaah. 58:6). Ciise ayaa siidayn karay Siimon u xidhnaantii sharka oo ku sii dayn karay awooddiisa u gaarka ah si la mid ah sidii uu uga xoreeyay ganaaxii dembiga. Dembigu labo qaab ayuu leeyahay: (1) Dhimasho xagga jidhka iyo Ruuxaba ah iyo (2) kan ku jira xakama ama xayndaabka nolosha dembiilaha (waa mid waxyeellaysa kuwa badbaaday iyo lumay labadaba cf. I Korintos. 3:1-3). Dembiga waa in laga adkaadaa waqtigan iyo waqtiga dambe intaba; ganaaxiisa iyo xooggiisa waa in laga adkaadaa, laakiin Masiixa iyo Ruuxa ayaa middan samayn karam laakiin maaddaama aan nahay rumaystayaasha waa in aan miidan u oggolaannaa in ay sameeyaan!

8:24 “Rabbiga ii barya” Kani waa Fal amar ah oo tegay oo aan toosnayn (jamac, kaasoo ka xidhiidhi kara, kooxda hawsha wadda oo dhan). Siimon waxa uu ereyga Butros ku soo celinayaa aayadda. 22. Ereyadii Butros ayaa ka nixiyey isaga. Anigu waxa aan rumaysanahay in Siimon uu yahay nin rumaysad leh, laakiin cusub, oo ilmo ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 8:25

²⁵Haddaba iyagu markay marag fureen oo Rabbiga hadalkiisa ku hadleen, waxay ku noqdeen Yerusaaalem, waxayna tuulooyin badan oo reer Samaariya ah ku wacdiyeen injiilka.

8:25 “markay marag fureen” Ka eeg tasmada 2:40.

▣ **“waxayna tuulooyin badan oo reer Samaariya ah ku wacdiyeen injiilka”** Tani waxa ay muujinaysaa dareenka is beddel ee qaar Rasuullada ee reer Samaariya ku aaddan Waxa ay u muuqataa in “ereyga Rabbiga” iyo “injiilku” ay isku mid yihiin ama macnahoodu siman yahay.

NASB (UPDATED) TEXT: 26-32

²⁶laakiin Rabbiga malaa'igtiisa ayaa waxay la hadashay Filibos, iyadoo ku leh, Kac oo aad xagga koonfureed. oo waxaad raacdaa jidka Yerusaaalem ka taga ilaa Gaasa taasoo cidla ah. ²⁷ Wuuna u

kacay oo aaday; oo waxaana ku soo baxay nin bohon oo Xabashi ah oo amar weyn ka hoos hayay Kandake boqoraddii Xabashida, wuuna u talin jiray maalkeeda oo dhan, wuxuuna Yerusaleem u yimid inuu Ilaah caabudo. ²⁸Kolkuu ka soo noqonayay, ayuu ku fadhiiyey gaadhifaraskiisa. oo wuxuu akhriyeyey kitaabka nebi Isayos. ²⁹Ruuxuna wuxuu Filibos ku yidhi, Ku dhowow, oo gaadhigan raac. ³⁰Oo Filibos markuu ku orday, wuxuu maqlay isagoo akhriyaya kitaabka nebi Isayos, wuxuuna ku yidhi, Ma garanaysaa waxaad akhriyaysid? ³¹Kolkaasuu yidhi, Sidee baan ku garan karaa in lay toosiyo mooyaane? Markaasuu Filibos ka baryay inuu soo fuulo oo la fadhiisto. ³²Haddaba meeshuu Qorniinka ka akhriyeyey waa tan, Isaga sidii wan la qalayo baa loo kaxeeyey; Oo sidii lax ku aamusan ninka dhogorta ka xiira hortiiisa, Isagu afkiisa ma uu furo 33 Intuu is-hoosaysiiyey baa gartiisii laga qaaday; Farcankiisii yaa sheegi doona? Maxaa yeelay, noloshiisa dhulkaa laga qaaday. ³⁴Bohonku wuxuu Filibos u jawaabay oo ku yidhi, Waxaan kaa baryayaa, Nebigu yuu ka hadlayaa? Ma isaga qudhiisaa mise waa mid kale? ³⁵Filibos baa afkiisa furay, oo intuu Qorniinkan ka bilaabay ayuu isaga ku wacdiyey Ciise. ³⁶Kolkay waddada marayeen waxay yimaadeen meel biyah, bohunkuna wuxuu yidhi, Bal eeg, waa biyo. Maxaa iga celinaya in lay baabtiiso? ³⁷Oo Filibos wuxuu ku yidhi, Haddaad qalbigaaga oo dhan ka rumaysatid, waa suurtoowdaa. Wuuna u jawaabay oo yidhi, Waxaan rumaysanahay in Ciise Masiix yahay Wiilka Ilaah. ³⁸Markaasuu amray in gaadhigu joogsado; labadooduna biyahay galeen, Filibos iyo bohonkuba, oo wuu baabtiisay isaga. ³⁹Oo markay biyihii ka soo baxeen, ayuu Ruuxii Rabbigu dhuftay Filibos, bohonkuna mar dambe ma uu arkin isagii, maxaa yeelay, jidkiisii ayuu iska qaaday isagoo faraxsan. ⁴⁰laakiin Filibos waxaa laga helay Asootos, oo magaalooyinkuu dhex marayay oo dhan wuxuu ku wacdiyey injiilka ilaa intuu gaadhay Kaysariya.

8:26 “Rabbiga malaa’igtiisa ayaa waxay la hadashay Filibos” Halkan “Rabbiga Malaa’igtiisa” iyo “Ruuxa Qudduuska ah” waxa ay u muuqdaan kuwo isku mid ah (cf. aayadda. 29). Tani waa mid si caadi looga dhex garanyo Falimaha Rasuullada. Eeg tusmada 5:19.

■ **“Kac oo aad xagga koonfureed”** Kuwan labadooduba waa amar. Tani waxa ay tilmaamaysay labo waddo oo Masar loo aado. Farriintan waxa ahayd mid cad maaddaama ay meel gaar ah tilmaamayso. Tani waxa ay ay ahayd mid si Ilaahiyah ah loogu dooranayey qof wacdiye ama gaardhsiye warka wanaagsan (sidoo Bawlos oo kale).

■
NASB “(Tani waa waddo cidlo ah)”
NKJV “tani waa cidlo”
NRSV “(Tani waa waddo lamadegaan ah)”
TEV “(Waddadan beryadan lama isticmaalin)”
NJB “waddada saxaraha ah”

Haddii ay tani tahay, faallo uu Luukos bixinayo, Luukos ma wuxuu caddaynayaa wax qabadkiisa, mise tan ayaaba ah faallo ka timid Luukos wax qabadkiisa (ugu dhawaan Filibos, cf. Acts 21:8)? Su’aalahan loogana jawaabi karo sida ay yihiin. Waxyigu waxa uu daboolaa wax-soo-saarka Baybalka dhib inta qof eek ala duwan ee ku jirta ama lugta ku leh.

8:27 “amar weyn” Ereyga “amar weyn” waxa ay nooc ahaan sheegaysaa ereyga ah “eunugh.” Arrintu si kastaba ha ahaatee, lama hubo in uu jidh ahaan eunuch ama in uu iska ahaa sarkaal maxkamadeed (macne la soo qaaday). Axdigii Hore , Footifar waxaa loogu yeedhi jiray enuch laakiin isagu waa uu guursaday (cf. Bilowgii. 39:1). Axdigii Hore dhexdiisa, Sharciga Ku Noqoshadiisa. 23:1 waa loo diiday in enuch ee ka mid noqdo bulshada Yuhuudda ah; hase yeeshee, sida ku qoran Ishacyaah 56:3-5,xarrimiddan waa la qaaday. Tani waxa ay muujinaysaa faca cusub ee Ruuxa ee waagu u baryey ama soo shaac baxday. In ninkani uu ahaa mid ilaah ka baqa iyo in uu matalaad ahaa ma kala cadda, laakiin waa uu u dhawaa. Weedha wax qeexaysa waxa ay muujinaysaa in uu ahaa sarkaal sare oo dawladeed.

■ **“Kandake boqoraddii Xabashida”** Kandake waa magac ahaa sida “Fircoon” iyo “Kaysar”sababta loo sheegayo boqoradda Itoobiya ayaa ah in boqorka Itoobiya loo tix gelin jiray sidii ilaah, oo sidaas daraaddeed, hoostiisa ayuu joogay si uu u qabto waxyaabaha yaryar ee isaga ka hooseeya ama arrimaha siyaasadda.

8:28 “wuxuu akhriyeyey kitaabka nebi Isayos” Hubaal ninkanu waxa uu soo iibsaday qoraalladii haragga ku qornaa ee Ishacyaah, oo laga yaabay in ay ahaayeen sagaal iyo labaatan dhudhun dhererkoodu (sida qoraalladii duuddubnaa ee laga helay Badda Dhimashada). Hagiddii Ruuxa awgeed, waxa uu furay boggii ka hadlayey Masiixa ee Ishacyaah 53:7-8 oo waa uu akhrinayey.

8:29 “Ruuxuna wuxuu Filibos ku yidhi, Ku dhowow, oo gaadhigan raac” Kani waa fal tegay oo aan toosnayn oo amar ah, oo macnaha tooska ahu noqonayo “in lagu xidhmo.” Ruuxa ayaa Filibos hagaya meel kasta oo uu u socdo.

8:30 “Oo Filibos markuu ku orday, wuxuu maqlay isagoo akhriyaya kitaabka nebi Isayos” Dadkii hore cod dheer ayey wax ku akhrin jireen xitaa marka ay kreligood yihiin.

☐ **“Ma garanaysaa waxaad akhriyaysid?”** Alla maxay su’aal weyn tahay! Waxaa macquul ah in la aqriyo Qorniin oo aan si cad loo arag waxa ku talo galkiisu yahay. Ruuxa ayaa Filibos ku hagaya “ballan rabbaani ah” taasoo

1. Muujin doonta faca cuub ee soo bixi doonay
2. marqaati xoog leh siin doonta koox dad kale ah.

8:31 A. T. Robertson’s *Word Pictures in the New Testament* faalladiisa ama tafsiirkiisa ku aaddan aayadda. Tani waa shuruud isku qasan, gabaggabada marka hore imanaysa waxaa iska leh heerka afraad. . .waxaa qodob aan wax caddaynayn, laakiin shuruuddu. . . waa heerka koowaad. . .waa dhacdo good oo waafi ah oo ku jirta Koine. (bogga110). Xaaladdan heerka koowaad ah, sida Luukos 19:40 waxa uu adeegsanayaa ereyada *ean* baddalka *ei*. Xaaladda waxaa lagu go’aamiyaa falka uu ku jiro, ee ma aha dhismaha jumlada (cf. Luukos 19:40).

8:32-33 Xigashadani waxa ay ka timid Mawduuc ku saabsaqn Masiixa oo ku jira Septuagint-ga Ishacyaah 53:7-9. Waxaan aad mucjiso iigu noqota sida ay aayadahani u xooggan yihiin oo aysan weliba u jirin aayado kale oo ku saabsan Masiixa Axdigii Hore dhexdiisa. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Filibos waxa uu meel saxa ka bilaabayaa akhriska oo waxa uu sharraxayaaa mawduuca ku saabsan noloshii, adeeggii, dhimashadii, iyo sare kiciddiin Ciisihii reer Nasatret. Wax sii sheegidii Axdigii Hore waxa ay ku oofsantay ama ku kaamilantay cafiskii noo soo maray Masiixa ee cid walba loogu deeqay!

8:35 “Filibos baa afkiisa furay” Tani waxa ay muujinaysaa sida uu cutubkan ku jira Axdigii Hore uu udub dhexaadka ugu yahay waxa qusheeya “Adeegaha Silcaya” ee faafinta injiilka. Waxaan rumaysanahay in Ciise qudhiisu, uu kaniisaddii hore ama bilowgii u muujiyey in wax-sii-sheegidyadan hore ay ku dhaqan galeen isaga (cf. Luukos 24:27).

8:36 “Bal eeg! waa biyo! Maxaa iga celinaya in lay baabtiiso” Filibos farriintiisa injiilka waxaa ku jira baabtiis (cf. Matayos 3; 28:19; Fal 2:38; Rooma. 6:1-11; Kolosay. 2:12)! Mawduuc Gaar ah ka eeg: 2:38. Ogsoonow isagu waxa aqbalaad ah ugama uusan baahanay Rasuulladii Yerruusaalem joogay. Baabtiisku ma aha mabda’ kooxeed ama firqo, laakiin waa arrin ku saabsan boqortooyada. Waa in aan ka taxaddarnaa arrimaha ku saabsan firqooyinka ama dhaqanka ee dhoobaynaya biyaha biyaha durduraya ee baybalka maaddaama uu yahay shardi la inaga edoonayo in aynu maalinteennan fulinno!

Miyuu eunuch ka walwalay in la aqballo?

1. arrin xagjirnimo ah
2. arrin jidh ahaaneed
3. arrin dhaqaale bulsho
4. arrin xagtga Kaatajiisamka ah

Wixii caqabad ahaa oo dhanwaxa ay hoos galeen Ciise Masiix (cf. Efesos. 2:11-3:13). Oo mid kastaana waa uu u iman (cf. Yooxanaa 1:12; 3:16; Rooma. 10:9-13)!

8:37 Aayaddan, qoraysa qirahsadii eunuch, kuma ay jirto qoraalladii duuddubnaa ee Giriigga ee P45 (Chester Beatty Papyri), P74 (Bodmer Papyri), ama qoraalladiihore ee Giriigta ee !, A, B, ama C. midna kuma ay dhex jirto qaarka ka mid ah sida qoraalladii hore ee Vulgate, Syriac, Coptic, ama tarjumaadaha Itoobiya. Aayaddan I ma aha mid asal ahaan ku jirta Falimaha Rasuullada. UBS4 waxa uu bixinayaa ka saarid, isago ku qiimaynaya “A” oo macnaheedu yahay dhab. Xitaa kuma ay jirto daabacaaddii NASB-ga ee (1970), laakiin waxa qay ku jirtaa cusboonaysiintii iyadoo qaansooyin ku dhex jirta.

8:38-39 “biyahay galeen. . . biyihii ka soo baxeen” Tani caddayn qoraaleed uma ay noqonayso biyo gelinta macnaha guud waxa uu tilmaamayaa in ay biyo mug leh ku dhex socdeen, ma aha qodobka baabtiiska. Weligaa iska ilaali in aad ku fadhiisiso sharrax kale adigoo eexanaya!

8:39 “ayuu Ruuxii Rabbigu dhufay Filibos” Tani in ay tahay mucjiso u shacday sida tii Eliiyaah (cf. I Boqorrada. 18:12; II Boqorrada. 2:16) ama Yexesqeel (cf. Yexesqeel. 3:14; 8:3) iyo in ay tahay tixraac ku saabsan safarkiisii ma ay kala cadda. Ruuxu si gaar ah wuu ugu jiray isbeedelkan soo Masiixiyobidda. Ogsoonow in warbixin ballaadhan iyo kaatajiisim aanu dhicin, laakiin soo Masiixiyobiddu waxa uu ku jiraan qoraalka Ishacyaah iyo iyo ku noolaashada Ruuxa.

▣ **“jidkiisii ayuu iska qaaday isagoo faraxsan”** Warka Wanaagsan waxaa had iyo goor la socda farxad(cf. 8:8). Ireaneus waxa uu qorayaa in eunuch-gan uu farrinta warka wanaagsan ee injiilka uu gaadhsiiyey dadkiisii. Ruuxa qudhiisu wuxuu sameeyay dardar-gelin iyo xer ka dhigid!

8:40 Filibos waxa uu sii waday (Fal tegay oo socda oo heerka) adeeggiisii wacdiga ee uu ugu socday Falastiin magaalada reer Ashdood (i.e., *Azotus*) jidkiisii uu ku tegayey waddankiisa Kaysariya ee dhanka badda. Waa ay caddahay in Filibos uu fahmay gaadhista caalamka iyo tilmaanta reer Samaariya iyo reer Itoobiya. Injiilka waxaa jiray xitaa Falastiiniyiinta!

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sababtee buu Ilaah u oggoolaaday in silic ku yimaado kaniisaddii hore?
2. Maxaa si gaar ah injiilka loogu wacdiyey rer Samaariya?
3. Siimon rumayste miyuu ahaa?
4. Sababtee ayey reer Samaariya u heli waayeen Ruuxa Qudduuska ah markii ay rumaysadka qaateen?
5. Qof nooc ee ah ayuu eunuch u taagnaa?
6. Sababtee ayey aayadda 37 ugu wada jidhi waysay Bayballada oo dhan?

FALIMAHA RASUULLADA 9

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Masiixiyobiddii Sawlos 9:1-9	Jidkuu Dimishaq: ee uu Sawlos ku Masiixiyobay 9:1-9	Masiixiyobiddii Sawlos-kii reer Tarses 9:1-9	Masiixiyobiddii Sawlos 9:1-2 9:3-4 9:5a 9:5b-6 9:7-9	Masiixiyobiddii Sawlos 9:1-2 9:3-9
9:10-19a	9:10-19	Ananiyas oo Baabtiisay Sawlos 9:10-19a 9:19b-22	9:10a 9:10b 9:11-12 9:13-14 9:15-16 9:17-19a	9:10-12
Sawlos oo ka Dhex Wacdinaya Dimishaq 9:19b-22	Sawlo oo Wacdinaya wax Ku Saabsan Masiixa 9:20-22		Sawlos oo ka Dhex Wacdinaya Dimishaq 9:19b-20 9:21	Sawlos oo ka Dhex Wacdinaya Dimishaq 9:19b-22
Sawlos oo ka baxsanaya Yuhuuddii 9:23-25	Sawlos oo ka baxsanaya dhimashda 9:23-25	Sawlos Booqashadiisii ugu Horraysay ee Yerusaalem 9:23-25	9:22 9:23-25	9:23-25
Sawlos oo Yerusaalem ku sughan 9:26-30	Sawlos oo Yerusaalem ku sughan Kaniisadda oo Koraysa 9:26-30	Sawlos oo Yerusaalem dhex jooga 9:26-30	9:26-30	Sawlos Booqashadiisii Yerusaalem 9:26-30
9:31	9:31	9:31	9:31	A Lull 9:31

Ayne'as oo la Bogsiiyey	Butros Safarkiisii Ludda iyo Yaafaa	Butros oo Arkay Ludda iyo Yaafaa	Butros oo Cuuryaan ku Dawaynaya Yaafaa
9:32-35	9:32-35	9:32-35	9:32-35
Dorkas oo Noloshii u soo Noolaatay			Butros oo Haweenay Noloshii ugu soo Celiyey Yaafaa Dhexdeeda
9:36-43	9:36-43	9:36-43	9:36-38
			9:39-42
			9:43

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

NASB (UPDATED) TEXT: 1:1-6

¹Waxaa warqaddan qoraya Bawlos oo ah addoonkii Ciise Masiix, oo loogu yeedhay inuu rasuul ahaado, oo gooni looga dhigay injiilka Ilaah. ²Injiilkaas ayuu Ilaah markii hore nebiyadii ku ballan qaaday xagga Qorniinka qoduska ah, ³oo wuxuu ku saabsan yahay Wiilkiisa, kii ka dhashay farcankii Daa'uud xagga jidhka. ⁴oo sarakiciddii uu ka sal-a kacay kuwii dhintay ay ku caddaysay inuu xagga ruuxa qodusnimada yahay Wiilka Ilaah oo xoog leh oo ah Rabbigeenna Ciise Masiix, ⁵kan aannu ku hehlay nimco iyo rasuulnimo, inaannu addeecidda rumaysadka magiciisa daraaddiis ugu geeyno quruumaha oo dhan. ⁶Idinkuna kuwaas dhexdooda aad ku jirtaan oo ah kuwii loo yeedhay oo Ciise Masiix.

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Xoojinta ku jira Falimaha Rasuullada waxa ay ka bilaabanaysaa
 1. Ka Rasuul Butros, ku Rasuul Bawlos
 2. Ka Falastiin, Ku dunida Medhatareeniyaanka
 3. Ka Yuhuudda, ku Kuwa aan Yuhuudda ahayn

- B. Masiixi noqoshadii Bawlos waa mid aad muhiimad ugu leh taariikhda kaniisadda oo ay saddex jeer ku jirto kitaabka Falimaha Rasuullada.
1. Diwaanka Luukos 9:1-30
 2. Dinwaanka Bawlos dadbkii badnaa ee Yerusaaalem ka hor, 22:3-16
 3. Dinwaanka Bawlos ka hor intii uu boqor II Agribibii uu joogay Kaysariya, 26:4-18
 4. Bawlos`wuxuu sidoo kale si kooban `ilsa waqtigan ugu sharraxay Galatiya. 1:13-17 iyo II Korintos. 11:32-33
- C. Silamid ahaanshooyinka u dhexeeya farriinta Istefanos iyo farriinta Bawlos waa kuwo cad. Bawlos wuxuu bilaabay in uu u adeego isla Yuhuudda Helenistigga ama qurba joogta ahayd kuwaasoo uu Istefanos ku wacdiyey kulankii sida ku jirta Falimaha Rasuullada (cf. 7:58; 8:1; 22:20). Waxaa xitaa macquul ah in Bawlos uu aha mid ka mid ah hoggaamiyeyaashii sunagogyadii Yuhuuddii qurbaha ee Yerusaaalem ku yiil oo uu Istefanos la dooday deetana isla lumay!
- D. Qaar ka mid waxyaabaha saamaynta leh ee uu Bawlos Masiixiga ku noqday
1. Guul-darradii nidaamka diintii Yuhuudda oo uu ka waayey nabad iyo farxad gudaha ah
 2. Noloshii iyo waxbaridyadii Ciise waxa ay ahaayeen kuwo aad loo yiqiin waxaana loogawaxa hadlay goobaha rabbaanihiinta (gaar ahaan Yerusaaalem)
 3. Waxa uu maqlay muxaadaradii Istefanos oo uu dhimashadisii kaga marqaati furay (waa macquul xitaa in uu Istefanos la dooday)
 4. Waxa uu arkay hab dhaqanka iyo iimaanka Masiixiyiinta silica ku hoos jirta
 5. Ku xisaabtankiisii shaqsi ahaaneed ee Rabbigii rase kacay ayaa beddelay wax walba

NASB (UPDATED) TEXT: 9:1-9

¹laakiin Sawlos oo weli dhaaranaya inuu cabsiiyo oo dilo xerta Rabbiga, ayuu wuxuu u tegey wadaadkii sare, ²oo weydiistay warqado uu la tago Dimishaq ilaa sunagogyada, si hadduu helo dadkii Jidka, ha ahaadeen rag ama dumarba, uu iyagoo xidhxidhan Yerusaaalem u keeno. ³Oo kolkoo sodcaalay, waxaa dhacday inuu Dimishaq u soo dhowaaday; oo dhaqsiba waxaa hareerihisa ka iftiimay iftiin samada ka yimid. ⁴Markaasuu dhulka ku dhacay, oo wuxuu maqlay cod isaga ku leh, Sawlosow, Sawlosow, maxaad ii silcinaysaa? ⁵Markaasuu ku yidhi, Yaad tahay, Sayidow? Wuxuuna ku yidhi. Waxaan ahay Ciisaha aad silcinaysid; ⁶laakiin kac oo magaalada gal oo waxaa lagu sheegi doonaa wixii kugu waajib ah inaad samaysid. ⁷Nimankii la sodcaalayayna hadal la'aan bay istaageen, iyagoo codkii maqlaya laakiin aan ninna arkaynin. ⁸Markaasaa Sawlos dhulkii ka kacay; markii indhihiisii furmeenna waxba ma uu arkin; markaasay gacanta ku hageen oo Dimishaq keeneen. ⁹ Saddex maalmood ayuu arag la aan joogay, waxbana ma cunin, waxbana ma cabbin.

9:1 “Sawlos oo weli dhaaranaya inuu cabsiiyo oo dilo” Tani waxa ay toos ahaan tilmaamaysaa “u hinraagid, ama u neeftuurid.” Sida ku jirta 26:11, Bawlos ayaa naf ahaantiisa iska sheegaya, in uu si cadho leh ugu cadhooday iyaga. Waa ay iska caddahay in Bawlos uu xitaa Masiixiyiin dilay (cf. 8:1).

▣ **“xerta Rabbiga”** Ereygan macnihiisu waxaa weeye arday ama kuwo wax baranaya. Waxa ay ku jirtaa oo qura injiillada iyo Falimaha Rasuullada. Ereygan waxaa si degdeg ah booskoodii u galay ereyga “qudduusiin.” Xusuusnow tirade ereyada lagu isticmaalay cutubkan ee qeexaya dadka Ilaah:

1. xerta, aayadaha. 1,10,19,25,26,36,38
2. Waddada, aayadda. 2
3. qudduusiinta, aayadaha. 13,32,41
4. walaalo, aayadda. 17.

▣ **“ayuu wuxuu u tegey wadaadkii sare,”** Tani waxa ay sida muuqata tixraac u tahay Sanherdin sida ku jirta (cf. Fal 26:10). Ka eeg tasmada Sanhedrin 4:5.

9:2 “warqado uu la tago Dimishaq ilaa sunagogyada” Dawladda Roomanku amar xadaysa ayey siiyeen Sanherdin oo uu ku xakameeyo kulana macaamilo dhacdooyinkasunagogga dhexdiia wixii la xidhiidha nolosha

Yuhuudda ee Boqortooyada dhexdeeda cf. I Macc. 15:16-21 or Josephus, *Antiq.*14.10.2). Diinta Yuhuuddu ayaawaxaa loo aqoonsaday in ay tahay diinta sharciga ah ee looga dhaqmayo dunida Giriigga iyo Roomanka.

Sida cad waraaqahani waxa ay ahaayeen kuwo masaafurin ama ciqaab u ah Yuhuudda Masiixiyiinta ah ee yeruusaalem uga cararay silicii Yuhuudda (cf. 9:14,21; 22:5; 26:10).

▣ **“hadduu”** Tani waa shuruuc heerka saddexaad ah, oo ah jumlad muujinaysa ama macnaheedu yahay ficil macquul ah.

▣ **“dadkii Jidka”** Kani waxa uu ahaa erey magac u ah rumaystayaashii hore (cf. 19:9,23; 22:4; 24:14,22 iyo sidoo kale 18:25,26). Waxa uu ku lug leeyahay Axdigii Hore, wuxuuna ku tilmaamayaa hab-nololeed iimaan (cf. Sabuurrada. 1:1; 16:11; 119:105; 139:24; Maahmaahyadii. 4:10-19). Ciise wuxuu fikirkan wuu adeegsaday marka aan eegno sida ku jira Matayos. 7:14 asaga qudhiisuna waxa uu adeegsaday magac ahaan sida ku jirta Yooxanaa 14:6. Masiixiyaddu waa ku talo shaqsi ahaaneed oo uu xidhiidh maalin kasta ahi la socdo.

▣ **“Dumar”** Sheegidda dumarka saddexda jeer kooxaha dhexdooda ee uu Bawlos silciyey waa hab lagu muujinayo awoodda ficillada Bawlos (cf. 8:3; 22:4). Luukos quse gaar ah ayuu ka leeyahay dumarka!

9:3 “Dimishaq” Tani waxa ay ahayd maaglo qadiimi ah oo magaalo madax u ah dhulka maammulkii Rooma ee Suuriya oo ku taal waqooyi/waqooyibari Galiili. 150 mayl ayey u jirtay Yerusaleem.

▣ **“oo dhaqsiba”** Ereygani waxa uu sidoo kale leeyahay soo jeedinta ah “si lama filaan ah.”

▣ **“iftiin samada ka yimid”** Bawlos waxa uu iftiinkan uu soo maray si ka duwan u la xidhiidhinayaa saddex arrimood oo wixii uu soo maray ah sida ku jirta Falimaha Rasuullada

1. “waxaa hareerihisa ka iftiimay iftiin samada ka yimid” (9:3)
2. “in dhaqsiba iftiin weyn oo samada ka yimid hareerahayga ka iftiimay” (22:6)
3. “waxaan hadhkii arkay, intaan jidka marayay, iftiin samada ka baxaya oo qorraxda ka sii dhalaal dheer, oo ka iftiimaya hareerahayga aniga iyo kuwii ila socdayba” (26:13)

Bawlos waxa uu si muuqata u xusuustaa dhacdadan! Waxaa macquul ah in iftiinkanii fiqi ahaan iyo muuqaal ahaanba uu ahaa ama la xidhiidhay *Shekinah* ammaanta la joogtii YHWH uu dadka reer Bani Israa’iil la joogay intii lagu guda jiray xilligii ku wareeyageen saxarihi lama degaanka. Ujeedka Cibraaniyada ee “ammaan” waxa uu u qaadanaayaa qaabka iftiinka ifka badan ee ka imanaya dhacdadan taariikhiga ah (Ka eeg Mawduuc Gaar ah: Ammaanta 3:13). Iftiinkani waxa uu Bawlos oo rabbaani ah ama diinta Yuhuudda haysta tusi lahaa in tani au ahayd lajoogita gaarka ah ee Ilaah.

9:4 “wuxuu maqlay cod” Codkan samaawiga ah waxa uu ahaa mid ay Yuhuuddii sharcigu garanayeen. Waxaa loo yaqaan *bath kol*. Tani waxa ay Yuhuuddii siisay ama ay ku helaan war-bixin ama xaqiiqjin ka timaadda Ilaah (intii lagu guda jiray waqtigii Baybalka ee u dhexaysay Soo xidhiddii Malaaki [ama Taariikhda] iyo bilowgii adeegii Yooxanaa Baabtiisaha). Qaabkan muujintu lagama maarmaan ayuu ahaa maxaa yeelay ma jidhin nebiyo wax loo waxyooday intii waqtigan lagu guda jiray.

▣ **“Sawlosow, Sawlosow”** Afka Cibraaniga ku soo celcelinta magacan waxa ay tilmaamaysay awood.

▣ **“maxaad ii silcinaysaa”** Tani waa mid si xad dhaaf ah fiqi ahaan u muuqata maxaa yeelay waxa ay muujinaysaa isla socodka iyo isku dhawaanshaha u dhexeeya Ciise iyo kaniisaddiisa (cf. Matayos. 10:40; 25:40,45). Bawlos waxa uu silcinayey kaniisadda, laakiin Ciise ayaa si shaqsi ahaaneed u qaatay. Laga bilaabo Falimaha Rasuullada 26:14 waxaan ognahay Ciise uu Bawlos kula hadlay afka Aramaygga.

Sidoo kale waa Muhiimad fiqi ahaaneed in Masiixiyaddu aya tahay labadaba qof (Ciise) iyo koox (kaniisadda). Sidoo kale ahmiyad weyn ayey fiqi ahaan leedahay in Masiixiyaddu tahay labadaba (Ciise) iyo koox (kaniisadda). Tilmaamaha isla socda ee kaniisadda loo adeegsaday waxa ay yihiin:

1. jidh
2. qoys

3. dhisme
4. qudduusiin

Dhammaantoos waxa ay xoojinayaa dabeecadda isla socota ee rumaysadka (cf. I Korintos. 12:7). Si shaqi ahaaneed ayey ku bilaabataa, laakiin si koox ahaaneed ayey u gudubtaa (is daryeel iyo muhiimadsiin). Habka shaqsi ahaaneed waxaa laga arki karaa Bawlos ka hadalkiisii Aadan iyo masiixa sida ku jirta Rooma. 5:12-21. Midi waxa uu kuwa kale oo dhan la yahay xubin; mid ayaa kuwa kale oo dhan saamayn kara (cf. Yashuuca 7).

9:5a “Yaad tahay, Sayidow” Muxuu Bawlos mu tusinayaa marka uu adeegsanayo ereyga “sayidow”?

1. Mudane, magac xushmo ah (ex. Yooxanaa 4:11)
2. YHWH, oo loo tarjumay Sayid sida ku jirta Axdigii Hore (ex. Bilowgii. 2:4)

Haddii ujeedku uu yahay layaab qura, dabadeed waxa ay tilmaamaysaa midda 1# oo ah xushmi, laakiin haddii iftiinka samada ka yimid uu u taagan yahay ficil Ilaah, dabadeed arrintu waxa ay noqonaysaa kan 2#. Haddii ay noqoto 2#, ujeedu waxaa weeye in fiqigii rabbaani ee Bawlos la taabta. Alla muxuu waqtigan cabsi iyo wareen lahaa! Ka eeg Mawduuc Gaar ah: Magacyada Ilaah 1:6.

9:5b-6b Aayadahani lagama helayo qoraalladii hore ee Giriigta. Waxaa laga heli karaa oo keliya hal qoys oo qoraallada Laatiinka ah. Erasmus oo laga tarjumay Vulgate, laakiin waxay iyagu isaga kaga jiraan daabacaadda ugu horraysa ee Axdiga Cusub ee Giriigga ee 1516. Ereyadan waxaa waxaa laga dhex helayaa Falimaha Rasuullada 26:14. Kusoo daristooda halkan waxa ay muujinaysaa janjeerid qoraallada ah si loogu sameeyo hab isla siman iyo faallooyin buuxda.

9:5 “Waxaan ahay Ciisaha aad silcinaysid” Bawlos waxa uu ku doodayaa in uu arkay Masiixii Ammaanta lahaa (cf. Fal 22:14; I Korintos. 9:1; 15:8-9). Bawlos wuxuu waxan soo maray gadaal ugafahmi doonaa in ay tahay qayb uyeedhistiisa ah si uu kuwa aan Yuhuudda ahayn Rasuul ugu noqdo. Nijaarkii isku tallaabta lagu qodbay ee Naasaret ka yimid ayaa ah Masiixii ammaanta lahaa!

9:6 Aayaddan waxaa si faahfaahsan loogu dhex sharraxay aayadaha. 10-19.

▣ **“inaad samaysid”** Ka eeg tasmada buuxda ee *dei* 1:16.

9:7 “Nimankii la sodcaalayayna” Tani waxa ay sida macquulka ah la xidhiidhaa

1. Booliskii Macbudka oo raacay Bawlos
2. Taageerayaal kale oo Yuhuud ah, ugu dhawaan oo ugu dhawaan ka yimid sunagogyadii Yuhuuddii qurba-joogta ahayd
3. arday kale oo fiqiga baranaysay oo ka timid Yeruusaalem

▣ **“iyagoo codkii maqlaya laakiin aan ninna arkaynin”** Waxaa jira waxyaabo u muuqda in ay kala duwan yihiin oo u dhexeeya 9:7 iyo 22:9oo ku jira faahyaahinnada dhacdadan. Waxaa jiray aragtiyo dhowr ah oo ku saabsan sidii middan macaamili lahaa:

1. Waa sabab la xidhiidha xagga naxwaha. Ereyga oo fal-sameeye ah “in la maqlo” ayaa qaadan kara booska lahaanshaha (9:7) ama Fal-lagu-sameeye (22:9). Hababkan kala duwan ayaa waxa ay leeyihiin wax ay muujinayaan ama soo jeedinayaan oo kala duwan. NRSV, sida ku qoran sharrixiisa waxa uu leeyahay “in Giriiggu uu soo jeedinayo in kuwii la swocday ay maqleen, laakiin maysan ahayn ereyo lagu hadlay.”
2. Kuwo kale waxa ay sheegayaan in ay la mid tahay Yooxanaa 12:29-30 taaso ku saabsan Ciise soo geliddiisii Yeuusaalem iyo codkii samada ka yimid.
3. kuwo kale waxa ay sheegayaan in Bawlos codkiisii ay la xidhiidho, oo uusan kii Ciise ahayn. Waxaay maqleen Bawlos oo hadlaya, laakiin maysan maqal Ciise oo hadlaya.
4. Kuwo kale waxa ay sheegayaan in tani la mid tahay dhibaata ka taagan saddex injiil marka laga reebo Yooxanaa. Qoraayaasha injiilka ee kala duwan ayaa qaabab kala duwan u diwaan geliyey shacdooyinkii, muxaadaroyinkii ama kulannadii, iyo falimihii Ciise, kuwaasoo kala ahaa aragtidi ayy maqaatiyaasha goob-joogayaasha ahi kala qabaan.

9:8 “markii indhihiisii furmeenna waxba ma uu arkin” Bawlos si cad ayaa dhibaatooyin xagga indhaha ah ugu dhaceen marka halkan laga bilaabo (cf. Galatiya. 4:13-15; 6:11). Anigu, shaqsi ahaan, waxaan rumaysanahay Bawlos “qodaxda ku jirta jidhkiisa” (cf. II Korintos. 12:7-10; Galatiya. 4:13-15; 6:11) ay habeen ku dhacday xaaladdan awgeed. Arrin jees-jees leh ayaa halkan yaal; Bawlos waayo aragnimadiisa ah in dib loo soo jaheeyo. Waxa uu u maleeyay in uu wax arki karay (jidka ahaan iyo ruux ahaan cf. Yooxanaa 9), laakiin waxa uu arkay in uu indho la’ yahay. La kulankan Masiixa kaddib xilli ayuu jidh ahaan indho la’aa, laakiin indhihiisa ruux ahaaneed aad ayey u furnaayeen!

9:9 “Saddex maalmood ayuu arag la aan joogay” Kani waa fal tegay oo aan toosnayn. Mufasiriinta qaar waxa ay tan u arkaan dhacdada aragtida samaawiga ah ee Bawlos sida ku diwaan gashan II Korintyos. 12:1-4.

▣ **“waxbana ma cunin, waxbana ma cabbin”** Bawlos waa uu soomanaa oo tukanayey (cf. aayadda. 11). Alla maxay dib u soo celini halkaa ka shacday sidii ku jirtay Bawlos maankiisa (fiqi ahaan) iyo qalbi ahaan (doonista)! Waxa uu bilaabayey is beddelkii ahaa in uu ka soo baxo silciyihii injiilka oo uu noqdo faafiyaha injiilka!

NASB (UPDATED) TEXT: 9:10-19a

¹⁰Haddaba waxaa Dimishaq joogay nin xer ah oo la odhan jiray Ananiyas: oo Rabbigu wuxuu kula hadlay riyo, isagoo ku leh, Ananiyasow. Isna wuxuu ku yidhi, Waa i kan, Rabbiyow. ¹¹Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi Kac oo aad jidka la yidhaahdo Toosane, oo waxaad guriga Yuudas ka doontaa nin la yidhaahdo Sawlos oo reer Tarsos ah: oo bal eeg, waa tukanayaaye: ¹²oo wuxuu arkay nin la yidhaahdo Ananiyas isagoo u soo gelaya oo gacmihiisa dul saaraya inuu araggiisii helo. ¹³laakiin Ananiyas baa u jawaabay oo ku yidhi, Rabbiyow, waxaan dad badan ka maqlay ninkanu intuu shar badan u gaystay qoduusiintaada Yerusaleem jooga: ¹⁴halkanna wuxuu wadaaddada sare ka haystaa amar inuu xidhxidho kuwa magacaaga kuugu yeedha oo dhan. ¹⁵laakiin Rabbigu wuxuu ku yidhi, Soco, maxaa yeelay, wuxuu ii yahay weel aan doortay inuu magacayga hor geeyo dadka aan Yuhuudda ahayn iyo boqorrada iyo reer bini Israa'iil; ¹⁶maxaa yeelay, waxaan tusi doonaa waxyaalaha waajib ku ah inuu u silco magacaygii dartiis. ¹⁷Markaasaa Ananiyas tegey oo gurigii galay, oo intuu gacmihiisa dul saaray, ayuu wuxuu ku yidhi, Walaal Sawlosow, Rabbi Ciise oo kuugu muuqday jidkaad ku timid baa ii soo diray inaad araggaaga heshid iyo in Ruuxa Qoduska ah kaa buuxsamo. ¹⁸Oo markiiba waxaa indhihiisa ka soo dhacay wax xuubab u eg, wuuna helay araggiisii: markaasuu kacay oo waa la baabtiisay: ¹⁹cunto buuna cunay, waana xoogaystay.

9:10 “Ananiyas” magacan macnihiisu waa “YHWH ammaan ayuu mudan yahay.” Sida cad noqonayey Yuhuudi rumaysad leh oo magac wanaagsan leh, oo qaxooti muusan ahayn (cf. 22:12).

▣ **“Waa i kan, Rabbiyow”** Kani waa hadal sarbeebed af Yuhuudi ah oo helitaan (cf. Ishacyaah. 6:8). Aayadda 11 si cad ayaa ayey wax u tibaaxaysaa, maxaa yeelay waa tilmaan aad qaas u ah. .

9:12 “wuxuu arkay nin la yidhaahdo Ananiyas” “Aragti ahaan” kuma jirto qoraalladii qadiimiga ahaa ee Giriigga P74, I, iyo A, laakiin waxaay ku dhex jirtaa MSS B iyo C. UBS4 akhris yar ayuu dhex gelinayaa qoraalka, laakiin “C” ayuu siinayaa isaga oo ku qoomaynaya oo ah (way adag tahay in go’aan laga gaadho). Aayaddani waxa ay muujinaysaa in Ananiyas imaanshadiisii, ficilladiisii, iyo farriintiiba ay xaqiijinayaan ereyadii ugu horreeyay ee uu Ciise oo ku socday Bawlos (cf. aayadda. 6)

▣ **“oo gacmihiisa dul saaraya”** Ka ee Mawduuca Gaarka ah eeg 6:6.

9:13 “waxaan dad badan ka maqlay” Sida cad Ananiyas waxa uu maqlay war bixinnadii foosha xumaa ee Bawlos silcintiisa xadhada lahayd ee rummaystayaashii Yuhuudda qaxootiga ah ee ka soo tegay Yerusaleem.

▣ **“qoduusiintaada”** Ereyga qudduus *hagioi* waxa uu la xidhiidhaa ereyga Giriigga ah ee “qudduus” (*hagios*). Tix-raac ahaan Axdigii Hore waxa uu la xidhiidhaad (*kadosh*) shay, qof, boos, si gaar ah meel Ilaah loogu dhigo.

Ereyga “quduusiin” had iyo goor waa jamac marka laga reebo hal meel oo ku jirta Filiboy. 4:21, laakiin waxaa sidoo kale ku jira macne guud oo jamac ah. In Masiixi la noqdo waxaa weeyaan in la noqdo xubin ka mid qoys ama Rumahysadku dibad ka noqosho ma leh.

MAWDUUC GAAR AH: QUDUUSIINTA

Eraygan luqada Cibraaniga waxa lagu yidhaahdaa *kadash*, oo macnihiisuna waxa uu yahay qof amaba meel loo gaar yeelay Ilaah in lagu caabudo. Ilaah aadanaha waxa uu u abuuray inuu la yeesho xidhiidh, laakiinse denbiga (Bilowgii 3) ayaa sababay gebi u dhexeeya Ilaaha Quduuska ah iyo aadanaha denbiga miidhan ah. haddaba, Ilaah waxa uu damcay inuu dib xidhiidh ula yeesho dadkiisa, sidaasi darteedna dadka waxa uu ka rabaa inay noqdaan ‘quduus’ (Laawiyiintii 11:44; 19:2; 207, 21:8). Xidhiidh ku dhisan rumaysadka Ilaah ayaa dadku ay ku noqonayaan qoduuusiin iyagoo dhowraya axdigiisa, laakiinse haddana waxa loogu yeedhay nolol ay ku dheehan tahay quduusnimo (Matayos 5:48).

Noloshan quduusnimadu ay ku dheehantahay waa suurto gal, maxaa yeelay Masiixiyiintu si buuxda ayaa loo aqbalay oo lagu cafiyay nolosha Ciise Masiix iyo camalka iyo joogitaanka Ruuxa Quduuska ah oo dhex deggan qalbiyadooda. Arrintan haddaba waxa ka dhalanaya laba wax oo caqli gal ah:

1. Inay quduus ku noqdeen awoodda Masiixa iyo xaqnimadiisa
2. In loogu yeedhay inay noolaadaan nolol quduusa joogitaanka Ruuxa aawadeed.

Masiixiyiintu waa ‘quduusiin’ (*hagioi*) maxaa yeelay noloshooda waxa dhex jooga

1. Doonista Aabaha Ilaaha ah; (the Father, cf. John 6:29,40)
2. shaqada Wiilka Quduuska ah oo ah Ciise (Jesus, cf. IICor. 5:21)
3. iyo Ruuxa Quduuska ah oo la jira (cf. Rom. 8:9-11)

Haddaba Axdiga Cusubi hadiyo jeer qoduuusiin waxa uu uga hadlayaa iyaga oo badan (marka laga reebo hal mar oo ku jirta Filiboy 4:12, laakiinse xitaa qoraal ahaan waxay u muuqataa wax tilmaamaya dad badan). In haddaba la badbaado macneheedu waxa weeyi inaad qoyska ka mid ahaato, ood noqoto jidh ka mida dhismaha! Waayo rumaysadka uu inoo sheegayo Kitaabka Quduuska ahi wuxuu ku bilaabmaa shakhsi ahaan, laakiinse wuxuu ku yimaaddaa iskaashi iyo in Ilaah lawada caabudo. Dhammaanteen waxaan leenahay hadiyad ahaan la inoo siiyay (1 Korintos 12:11) caafimaad, korinin, iyo inaan ka mid ahaanna jidhka Ciise Masiix oo ah kaniisadda (1 Korintos 12:7). Waxaana la inoo badbaadiyay inaan adeegno! Oo quduusnimaduna waa waxa uu qoysku ku dhisan yahay!

9:14 “wadaaddada sare” Axdigii Hore dhexdiisa wadaad sare noqoshadu waxa ay ay ahayd nolol waxayna u gudbaysay qoysaska qaaska ah ee wiilasha Laawiyiintii (cf. Laawiyiintii. 8-10). Arintu si kastaba ha ahaatee, xilligii Roomaanka waxa ay tan u qateen xagga saraakiisha. Sidaas daraaddeed, waxaa jiray dhowr wadaaddo sare ah Qoyska Suddukiinta ee Annas.

☐ **“kuwa magacaaga kuugu yeedha”** Weedhan waxa ay leedahay tilmaamo weyn oo fiqi ah oo aad muhiim u ah. Luukos ayuu wuxuu Falimaha Rasuullada dhexdooda ugu adeegsaday

1. Qof Ciise tilmaansanaya (cf. 7:59)
2. Qof Ciise u aqbalay inuu yahay Badbaadiyaha (cf. 9:14,21)
3. Xigasho Axdigii Hore ah ka timid Caamos 9:12, meeshaasoo ay tilmaamayso qof loogu yeedhay magaca YHWH (i.e., rumaystayaasha, cf. 15:17)
4. Qof si bayaan ah dadka hortooda uga qirtay rumaysadka uu ku qabo Ciise (cf. 22:16)

Weedhani waxa ay sidoo kale qayb ka tahay codsigii Bawlos ee ka yimid Yoo’eel2:32 sida ku jirta Rooma. 10:9-13 (cf. II Tim. 2:22). Butros sidoo kale waxa uu adeegsanayaa isla cutubka (Yoo’eel 2:28-32) muxaadaradiisii Bentakostiga isagoo bandhigyadan ku magacaabay “ugu yeedha magaca Sayidka” isagoo ka soo xiganaya fRooma Yoo’eel 2:32. Magacu waxa uu u taagan yahay qofka. Iyagoo magaca dembiilayaasha u rogaya baryada Ciise in uu magacooda oo iyaga ku daro qoyskiisa. Mawduuc Gaar ah ka eeg: 2:22.

9:15 “Soco” Kani waa fal taagan oo heerka dhexe ah oo amar ah.Ciise wsi aan la filayn ayuu Ananies ugu diray Sawlos.

☐ **“wuxuu ii yahay weel aan doortay”** Oh, waa bal eeg nimcada weyn ee Ilaah doorashadiisa! Bawlos muusab uuxin kareen in uu horsed u noqdo shaqada adeegga si iskiis ah, ama uu awooddiisa ku doorto Masiixi noqoshada. Si Imuuqataayaa isaga loo qorshaystay!

☐

NASB, NKJV
NRSV, NJB
TEV

“dadka aan Yuhuudda ahayn hortooda”

“inuu magacayga hor keeno dadka aan Yuhuudda ahayn”

“inuu magacayga ka dhigo in ay dadka an Yuhuudda ahayn gartaan”

Maxay hadal bilow ah u tahay Yuhuudda in loo sheego (cf. Efesos. 3:7)! Hase yeeshee, tani had iyo goorba waxa ay ahayd qorshaha Ilaah (cf. Bilowgii. 12:3; Baxniintii. 19:5-6; Efesos. 2:11-3:13, Mawduuc Gaar ah ka eeg 1:8). Israa'iil waxa ay ahayd o qura qlab adduunka lagu gaarayo, oo laga sameeyay ekaanta Ilaah (cf. Bilowgii. 1:26-27), balse dhacay (cf. Bilowgii 3:15).

☐ **“iyo boqorrada”** Bawlos wuxuu la hadlay hoggaamiyeyaashii dawladda, yar iyo weynba, ugu dambayntiina Kaysar!

☐ **“iyo reer bini Israa'iil”** Bawlos habka aeggiisu waxa uu ahaa in uu marka kore wacdiyo sunagogyada degaanka (cf. Rooma. 1:16) in every city. Tani waxa ay Yuhuuddii iyo iyo dadkii Ilaah ka cabsanayey ee garanayey Axdigii Hore u oggolaatay in ay marka koowaad ka jawaabaan injiilka, dabadeed ayey ahayd in uu u laabto kuwa aan diinta lahayn ama aan Ilaah aqoon.

9:16 “maxaa yeelay, waxaan tusi doonaa waxyaalaha waajib ku ah inuu u silco magacaygii dartiis” Silicu ma aha mid reebmaya, laakiin waa mid caadi u ah Masiixiyiinta maaddaama ay joogaan duni dhacday (cf. Matayos. 5:10-12; Yooxanaa 15:18-21; 16:1-2; 17:14; Fal 14:22; Rooma. 5:3-4; 8:17-18; II Korintos. 4:7-12; 6:3-10; 11:24-33; Filiboy. 1:29; I Tesaloniika. 3:3; II Timoteyos. 3:12; Yacquub 1:2-4; I Butros 4:12-16).

Waxaa jdhiidh fiqi ahaaneed oo u dhexeeya silicyadii Masiixa iyo silicyada kuwa isaga raacayaashiisa ah ee boqortooyadan dhacday dhex jooga.

Kitaabka I Butros wada jirradan ayuu soo bandhigayaa.

1. Silicii Ciise, 1:11; 2:21,23; 3:18; 4:1,13; 5:1
2. Kan Raacayaashiisa, 1:6-7; 2:19; 3:13-17; 4:1,12-19; 5:9-10

Haddii Adduunka diiday Isaga isna kiisa ayuu diiday doonaa (cf. Yooxanaa 7:7; 15:18-19; 17:14).

9:17 “oo intuu gacmihiisa dul saaray” Ma jiro wax sal ah oo uu qorniinku u hayo fikirka ah “amar rasuuleed” in hadiyadoo ruux ahaaned lagu mannaysto mooyaane. Ananiyas waxa uu ahaa rumayste Dimishaq oo noqday

1. Afhayaanii iyo wariyihii Ilaah
2. Bawlos ahaanshihii in uu Ruuxa Qudduuska ahu ka buuxsamo(cf. aayadda. 17)
3. Bawlos Bogsashadiisii jidh ahaaneed (cf. aayadda. 18)
4. Baabtiisiddii BawlosPaul's baptism (cf. aayadda. 18)

☐ **“Walaal Sawlosow”** Alla muxuu tusaale baarrinimo iyo jacayl uu yahay!

9:18 “there fell fRooma his eyes something like scales” Kani waa erey farsamo daaweed marka dhaawac dahaar laga qaadayo Luukos waxa uu u adeegasanayaa in uu ku qeexo wixii indhihii Bawlos ku dhacay waqtigan bogsiinta. Ereygan lakabyada isa saaran waxaa loo adeegsaday qolofa isa saaran ee kalluunka sida ku jirta Septuagint-ga (cf. Laawiyiintii. 11:9,10,12; Sharciga Ku Noqoshadiisa. 14:9). Tilmaanta sarbeebta ah waxaa lagu dherx arki karaa Tirintii. 16:38,halkaasoo loo adeegsaday saxuun la isku garaacay. Sida ku jirta macnaha guud ee meeshan waxa ay ahayd qolof maqaar ah oo ka dhacday indhiha Bawlos.

☐ **“waa la baabtiisay”** Ananiyas ayaa sida muuqata baabtiisay Bawlos (cf. 8:36,38). Baabtiiska Axdiga Cusub waxa uu ahaa falimo addeecis tusaalihii Ciise (cf. Matayos. 3:13-17; Markos 1:9-11; Luukos 3:21-22) iyo amar (cf. Matayos. 28:19.) Waxa ay samaysaa ama calaamaysaa is beddel ah milkiilenimo iyo rumaysad.

9:19a “cunto buuna cunay, waana xoogaystay” Bawlos waxa uu soommanaa oo tukanayey illaa markii uu iftiinku dhulka ku garaacay (cf. aayaadda. 9). Marka isku uu saddex maalmood soommanaa (biyo iyo cunto la'aan), dabadeed waa in uu aad u tabar darraado.

NASB (UPDATED) TEXT: 19b-22

^{19b}Haddaba dhawr maalmood ayuu la joogay xertii Dimishaq joogtay. Act 9:20 Oo markiiba sunagogyada dhexdooda ayuu dadka kaga dhex wacdiyey Ciise inuu yahay Wiilka Ilaah. ²¹Dadkii maqlay oo dhammuna waa yaabeen, oo waxay yidhaahdeen, Kanu sow ma aha kii Yerusaaalem ku layn jiray kuwa magacaas ugu yeedhi jiray? Oo sababtaas ayuu halkan u yimid inuu iyagoo xidhxidhan hor keeno wadaaddada sare. ²²laakiin Sawlos xooggiisii baa u sii kordhay, wuuna wareeriyey Yuhuuddii Dimishaq joogtay isagoo caddaynaya inuu kanu yahay Masiixa.

9:20 “Oo markiiba sunagogyada dhexdooda ayuu dadka kaga dhex wacdiyey Ciise” Kani waa fal tegay oo aan dhammaystirnayn balse socday. Waxa uu noqon karaa (1) ficil bilowgii (2) ama ficil soo noqnoqonaya. Waa wax lala yaabo!

Wuxuu markii hore sunagogyadii Dimiqshaq la yimid waraaq uu ka soo qaatay wadaaddadii sarsare ee Yeruusaalem si uu u silciyo raacayaasha Ciise markanna waxa uu yimid isla sunagogyadii isagoo ku wacdinaya in Ciise yahay Masiixa (cf. aayadda 21).

☐ **“inuu yahay Wiilka Ilaah”** Kani waa adeegsiga magaca oo qura “Wiilka Ilaah” ee ku jira Falimaha Rasuullada (marka laga reebo xigashada laga aoo qaatay Sabuurada. 2:7 Falimaha Rasuullada dhexdoodadana 13:33). Asalkeeda Axdigii Hore waxa ay muhiimad ahaan soo cewlinaysaa ama laga arkayaa: (1) quruunta reer Israa’iil (cf. Hosheeca. 11:1); (2) Boqorka reer Israa’iil (cf. II Samuu’eel. 7:14); iyo (3) Masiixa (cf. Matayos. 2:15). Bawlos ku adkaanshadiisa waxdaaniyada Ilaah (Mawduuc Gaar ah ka eeg: 2:39) ayaa halkan lagu muujinayaa!

MAWDUUC GAAR AH: WIILKA ILAAH

Kani waa magaca ugu badan ee Axdiga Cusubi ku magacaabayo Ciise Masiix. Waxa hubaala in magacani uu yahay ilhaamin amaba waxyi ka yimid xagga Ilaah, oo waxa uu Ciise ku tilmaamayaa ‘Wiilka’ amaba ‘Wiilkayga’, sidoo kalena Ilaahna wuxuu ka dhigan yahay ‘Aabbaha’. Haddaba, magacani wuxuu Axdiga Cusub kusoo dhex arooray 124 jeer, oo xitaa Ciise Masiix isagu shakhsi ahaantiisa waxa uu ku tilmaamayaa ‘Wiilka Aadanaha’, waana waxyi la xidhiidha Daanyeel 7:13-14.

Marka aan eegno Axdiga Hore magaca ‘wiil’ waxa lagu magacaabi karaa afar kooxood:

1. Malaa’igaha (hadiyo goorna waa koox ahaan, Bilowgii 6:2; Ayuub 1:6; 2:1).
2. Boqorka Israa’iil (2 Samuu’eel 7: 14; Sabuurka 2:7; 89:26-27).
3. Umadda reer Israa’iil oo dhan (Baxniintii 4:22-23; Sharciga Kunoqoshadiisa 14:1; Hoosheeca 11:1; Malaakii 2:10).
4. Xaakinada Israa’iliyiinta ah (Sabuurka 82:6).

Haddaba, labo jeer ayaa Ciise Masiix loo tiiriyaa magacan, waana ‘wiilkii Daa’uud’ iyo ‘Wiilka Ilaah’ labadubana waxay la xidhiidhaan 2 Samuu’eel 7; Sabuurka 2 iyo 89. Marka aan eegno Axdiga Hore ‘Wiilka Ilaah’ si gaara looguma isticmaalin Masiixa marka laga reebo isagoo ah mid loo doortay boqornimada Israa’iil (eeg maraajicda *Dictionary of Jesus and the Gospels* p. 770). Sidoo kale “Wiilka Ilaah” waa magac la xidhiidha Masiixa, waana marka la eego (2 Esdras 7:28; 13:32,37,52; 14:9 iyo Enoch 105:52).

Magacani wuxuu aad uga dhex muuqdaa Axdiga Cusub, waxaanan ka arki karnaa meelo badan oo sigaara u tilmaamaya:

1. Jiritaankiisii hore (Yooxanaa 1:1-18).
2. Isagoo ka dhashay gabadh bikro ah oon nin arag (Matayos 1:23; Luukos 1:31-35).
3. Markii la baabtiisayay (Matayos 3:17; Markos 1:11; Luukos 3:22. Codka Ilaah ee samada ka yimid wuxuu midaynayaa boqortooyada Sabuurka 2 iyo adeegaha dhibaatoonaya ee Ishacyaah 53).
4. Jirraabaadii shaydaanka (Matayos 4:111; Markos 1:12,13; Luukos 4:1-13. Wuxuu shaydaanku isku dayay inuu ka shaki geliyo inuu yahay Wiilka Ilaah amaba ugu yaraan inuu ujeedooyinkiisa ku dhammays tiro waxyaalo ka gedisan tan isku tallaabta).
5. Isagoo ay qireen kuwo kasoo horjeeday
 - a. jinniyadii iyo ruuxyadii wasakhaysnaa (Markos 1:23-25; Luukos 4:31-37; Markos 3:11-12).
 - b. Rumaysad laawayaashii (Matayos 27:43; Markos 14:61; Yooxanaa 19:7).
6. Xertiisa oo qirtay
 - a. Matayos 14:33; 16:16
 - b. Yooxanaa 1:34,49; 6:69; 11:27
7. Isagoo naf ahaantiisa qiray
 - a. Matayos 11:25-27
 - b. Yooxanaa 10:36
8. Isagoo Ilaah kasoo qaaday Aabbihiis
 - a. Ilaah wuxuu ugu yeedhay ‘Aabbow’
 - (1)Markos 14:36
 - (2) Rooma 8:15
 - (3) Galatiya 4:6
 - b. Isagoo adeegsaday eragya Aabbe (*patēr*) si uu u tilmaamo xidhiidhka uu la leeyahay Aabbaha iyo Ilaahnimadiisa.

Marka aan soo koobno magacan ah “Wiilka Ilaah” waxa uu macne wayn u leeyahay kuwa yaqaanay Axdiga Hore iyo ballan qaadyadii lagusii sheegay, laakiin qorayaasha Axdiga Cusub, waxa ay dhibaato kasoo gaadhaysay sida ay u isticmaalaan dadka aan Yuhuudda ahayni, maxaa yeelay waxay ahaayeen jaahiliin aan waxba aqoonin.

9:21 yaddani waa waxa ay u samaysan tahay hab su'aaleed waxaan sugaysaa jawaabta "haa".

▣ **“burburin jiray”** kani waa erey si dhif ah loo adeegsado oo awood leh oo macnihiisu baabbi'in, in sidii qashinka loo burburiyo, ama in gebi ahaan la baabbi'yo. Waxaa laga helayaa oo qura halkan iyo Galatiya. 1:13,23 Axdiga Cusub dhexdiisa iyo IV Macc. 4:23. Bawlos silciye cadaw ah ayuu ahaa!

9:22

NASB **“Sawlos xooggiisii baa u sii kordhay”**

NKJV **“Sawlos xoog ayaa u sii kordhay”**

NRSV **“Sawlos waxa uu noqday mid si soo kordhaysa u awood bata”**

TEV **“Sawlos wacdintiisii waxa ay noqotay mid awood weyn”**

NJB **“Sawlos awooddiisii si adag ayey u kortay”**

Kani waa fal tegay oo aan toosnayn oo wax caddaynaya. Waqti ayey ku qaadatay in Sawlos hadiyadihiisii iyo xirfadihiisii ay koraan. Marka la eego macnaha guud tani waxa tilmaamaysaa xirfadihii wacdigiisii Sawlos (cf. TEV).

▣ **“Wareeriyay”** Kani waa fal tegay oo toosan oo wax caddaynaya oo tilmaamaya ficil soo noqnoqnaya waqti la soo dhaafay. Ereygan waxa uu afka Ingiriisiga ku noqonayaa “confounding” waana labo erey oo isku xidhan oo ka yimid “together” (*sun*) iyo “pour” (*cheÇ*). Ereygan waxaa laga helaa oo qura Falimaha Rasuullada.

1. 2:6, Lala yaabay

2. 9:22, lagu wareeray

3. 19:32, lagu dawakhay

4. 21:27, laga cadhooday

5. 21:31, Wareer

Yuhuuddu ma aanay sharrixi karin Masiixi noqoshadii Bawos ama iyo wacdigiisii xoogga badnaa ee ku saabsanaa in Ciise uu yahay Masiixii Axdigii Hore lagu sii ballan qaaday.

▣ **“caddaynaya”** Ereygan macnihiisu waxa uu noqonayaa so af jarid sida ku jirta (cf. Fal 16:10; 19:33) and by ballaadhin, si wax loo caddeeyo. Habka Bawlos waxa uu la mid ahaa kan Istefanos. Labaduba waxa ay Isticmaaleen Cutubyo Axdigi Hore ah iyo oofintoodii ku jirtay noloshii Ciisihii reer Naasaretsi ay u caddeeyaan in Uu ahaa Masiixii lagu ballan qaaday Axdigii Hore dhexdiisa

▣ **“Masiixa”** Kani wa hab la xidhiidha Masiixa oo ah (Kii la Subkay, Kii la Ballan Qaady in uu Imanayo, ka eeg Mawduuc Gaar ah: 2:31). Marar badan DIFINITE ARTICLE-ku waa uu ka hor maraa nmagaca (ex. 2:31,36; 3:18,20). Sawlos awood iyo qirasho ayuu ku muujinayey in Ciisihii reer Naasaret, ee lagu dilay Yerusaaalem, uu shaki la'aan yahay Wiilka Ilaah, Masiixa. Haddii tani ay run ahayd, wax walba waa ay ka beddeshay Yuhuuddii (iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn)! Si khaldan ayey u fakareen oo ay u diideen Isaga. Waxa ay diideen hadiyaddii Ilaah waxayna ku hareen ruux mugdi ah iyo baahi.

NASB (UPDATED) TEXT: 9:23-25

²³Oo markii maalmo badan dhaafeen, ayay Yuhuuddu ku tashadeen inay dilaan: ²⁴laakiin Sawlos waa ogaaday tashigoodii. Haddaba habeen iyo maalinba irdaha magaalada bay ka fiirin jireen inay dilaan; ²⁵laakiin xertiisii baa habeen qaadday oo derbiga ka sii daysay iyagoo dambiil ku dejinaya.

9:23 **“markii maalmo badan dhaafeen”** Waa in aan xisaabta ku darsannaa xisaabta Bawlos ee ku jirta Galatiya. 1:15-24, meeshaasoo uu waqti dheer ku qaatay Dhulka Cadabta ay la xidhiidho Boqortooyadii Nabataean (ee uu xukumayay Aretas IV, oo awoodda xukunka haystay laga bilaabo 9 B. C. illaa AD 40) halkaasoo ku tiil koonfur bari Dimishaq. Waqtiga saddexda sano ani waxa uu tilmaamayaa illaa adigu meel ku dhowsiddeed iyo toban bilood. Yuhuuddu waxa ay maalin qaybteed u tiriyeen ama u xisaabeen sida maalin buuxda (cf. Matayos. 26:61; 27:40,63); qiyaastan waxaa sidoo kale loo adeegsaday sannaddada

▣ **“ayay Yuhuuddu ku tashadeen inay dilaan”** Yuhuuddu waxa ay si cad kor u aadeen in ay u tagaan maammulayaasha bulshada (cf. II Korintos. 11:32-33). Tani waxa ay ahayd in ay Bawlos kuku ceebeeyaan maxaa yeelay waxa uu tan ku sharraxay ama ku sheegay falanqantiisii daciifka ahayd ee ku jirtay II Korintos 11.

9:25 “oo derbiga ka sii daysay” Waxaa qasab ah in tani ay la xidhiidho daaqad ama dariishad ku tiillay guri gaar ah oo ay qaybtiisa dambe xigtay derbiga ku wareegsan magaalada (cf. II Korintos. 11:33; Yashuuca 2:15; I Samuu’eel. 19:12).

NASB (UPDATED) TEXT: 9:26-30

²⁶Oo kolkuu Yerusaaalem yimid, wuxuu isku deyey inuu xertii ku darsamo; dhammaantoodse waa ka cabsadeen, maxaa yeelay, ma ay rumaysnayn inuu xer yahay. ²⁷Laakiin Barnabas baa kaxeeyey. oo wuxuu u geeyey rasuulladii oo u sheegay siduu Rabbiga ugu arkay jidka, iyo inuu la hadlay, iyo siduu Dimishaq geesinimo ugu wacdiyey magaca Ciise. ²⁸Markaasuu iyagii la joogay, isagoo la gelaya, kalana baxaya Yerusaaalem. geesinimona dadka ugu wacdiyaya magaca Rabbiga; ²⁹wuxuuna la hadlay oo la dooday Yuhuuddii Gariigta ahayd; iyaguse waxay doondooneen inay dilaan. ³⁰Kolkii walaalihii garteen. waxay keeneen Kaysariya, oo waxay u sii direen Tarsos.

9:26 “kolkuu Yerusaaalem yimid” Tani waxa ay ahayd siddeed iyo toban illaa saddex iyo soddon bilood kaddib (cf. Galatiya. 1:15-24). Aayaddani waxa ay muujinaysaa heerka shaki ee ay rumaystayaashii joogay Yerusaaalem ay ku qabteen silciyahooduu hore. Sida cad Falimaha Rasuulladu waxaa ku diwaan gashan dhowr Bawlos booqashooyinkiisa uu Yerusaaalen soo booqday ah markii uu Masiixiyoobay kaddib.

1. 9:26, booqashadii koowaad
2. 11:30, booqasho caawimaad ah
3. 12:25, shaqadii adeegga kaddib
4. 15:2, Golihii Yerusaaalem
5. 18:22, booqasho gaaban oo kaniisadda ah
6. 21:17, Booqasho uu la lahaa Yacquub iyo duqaydii oo dhilsay ballantii Naasareet iyo xabsigii

9:27 “Barnabas” macnaha la wada yaqaan, inkastoo uusan ahayn macne isku ekaysiin ah, waxa uu ahaa “wiilka dhiirri-gelinta.” Kani waxa uu ahaa quudduuska weyn ee lagu sheegay 4:36 kaasoo markii dambe noqday kii Bawlos hawshiisii adeegga ee ugu horraysay raacay. Mawduuc Gaar ah ka eeg: 4:36.

▣ **“wuxuu u geeyey rasuulladii”** Arrintan teeda kale ee keligeed ah waa Galatiya 1:18.

▣ **“oo u sheegay”** Barnabas wuu garanayey oo wuxuu la wadaagay marqaatifurkii Bawlos. Tani waxa ay furtay albaabkii aqbalaaddiisa (cf. aayadda. 28).

9:28

NASB “isagoo six or ah u soconaya”
NKJV “imanaya oo baxaya”
NRSV “soo galay oo tegay”
TEV “iskaba tegay”
NJB “meelaha iska soo marmaraya”

Kani waa hadal sarbeebed ku jira Axdigii Hore oo ka hadlaya nolosha iyo wax qabadka maalin kasta (cf. Tirintii. 27:17; I Boqorrada. 3:7).

9:29 “wuxuuna la hadlay oo la dooday Yuhuuddii Gariigta ahayd” Tani waxa ay tilmaamaysaa isla kooxda (Sonaggogyada Yuhuudda af Giriigga ku hadasha ee joogta Yerusaaalem) ee dilay Istefanos; immika waxa ay qorshaynayaa in ay dilaan Sawlos, oo isna ahaa Yuhuudi ka yimid qurbaha. Waxa ay u noodeen in Istefanos soo laabtay!

9:30 “Kolkii walaalihii garteen” Laga bilaabo 22:17-21 waxa aan ku baranaynaa in Ciise uu u muuqday Bawlos waqtigan si uu ugu sheego in uu ka tago Yerusalem. Ciise waxa uu Bawlos u muuqday dhowr jeer xullu uu adeeggiisa ku guda jiray si uu u dhiirri geliyo oo uu u ilaaliyo (cf. 18:9-11; 22:17-21; Iyo malaa’igtii Rabbiga sida ku jirta 27:23).

▣ **“Kaysariya”** tani waxa ay tilmaamaysaa dekadada Roomanka ee xeebta Medhitareeniyanka ee falastiin. Waxa ay ahayd xarumaha guud ee dawladdii Roomanka ee gudaha Falastiin.

▣ **“Tarsos”** Bawlos waxa uu hadda u socdaa in uu dhowr sano ku soo qaato magaaladiisii. Tarsos waxaay ahayd magaalo dadka loo oggol yahay. Waxa ay sidoo kale ahayd xarunta saddexaad ee ugu ballaadhan xagga barashada duniidii qadiimiga ahayd, ee ka dambaysa Alagsandariya iyo Atanis. Jaamacadihii ku yiil Tarsos waxa ay xoogga saarayeen falsafadda, cod-karnimada iyo sharciga. Bawloswuxuu si cad ugu tababbartay cod-karnimada iyo falsafadda luuqadda Giriigga.

NASB (UPDATED) TEXT: 9:31

³¹Sidaas darteed kiniisaddii ku tiil Yahuudiya iyo Galili iyo Samaariya oo dhan nabad bay lahayd, waana dhisantay oo badatay iyadoo ku socota cabsida Rabbiga iyo gargaarka Ruuxa Qoduuska ah.

9:31 Tani waa aayad loo koobaysa Masiixi noqoshadii Bawlos nana baraysa safarradii Burtos. Soo koobidyadan waxa uu Luukos had iyo goor ku dhex adeegsanayey Falimaha Rasuullada shexdoosa. Eeg Hordhaca IV ee Ujeedka iyo Qaabka, A.

▣ **“kiniisaddii”** Ka eeg Tasmada iyo Mawduuca Gaarka ah: 5:11 oo ogsoonow in “kaniisad” iyada oo aan jamaca ayan ay u taagnaan karto jameeco badan. Ereyga “kaniisad” waxa uu noqon karaa kaniisadda degaanka (ex. Kolosay. 1:18,24; 4:15,16), dhammaan kaniisadihii meel ku wada yaal (ex. Efesos. 1:22; 3:10,21; 5:23,24,25,27,29,32), iyo kaniisadaha oo dham caalam ahaan (ex. matayos. 16:18).

Ogsoonow maqaallada uu Luukos doonayo in uu halkan ku sharraxo.

1. nabad ka dhex jirta kaniisadaha
2. koritaan iyo badasho
3. raaxo ka timaadda Ruuxa

Alla muxuu is beddel ku dhacay silicii ku jiray 8:1! Weli dhibaato ayaa jirtay, laakiin Ilaah baahi kastaba xalliyay!

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxaa Bawlos aadka loogu nacay silcintiisii kaniisadda?
2. Maxay saddex qaab Bawlos Masiixiyoobiddiisii ugu jirtaa kitaabka Falimaha Rasuullada dhexdoodas?
3. Maxay ahayd muhiimadda ku jirtay Ananias inuu gacanta saaro oo uu baabtiiso Bawlos?
4. maxay ahayd muhiimaddii ku jirtay in Bawlos uu Ciise ku magacaabo “Wiilka Ilaah”?
5. Shabtee ayuu Luukos u diwaan gelin waayey saddexdii sano ee uu Bawlos jiray Carabta?

FAHANKA MACNAHA GUUD 9:32-10:48

- A. Inkastoo uu Kitaabka Falimaha Rasuulladu uu ku bilaabmayo is beddelka ka imanaya Butros ee ku imanaya Bawlos, cutubyada 9:32-12:25 waxa ay sheegayaan safarkii adeegga ee Butros.
- B. Qaybtani waxa ay diiradda saaraysaa Butros oo jooga Ludda, 9:32-35; Yaafaa, 9:36-43, 10:9-23; Kaysariya, 10:1-8, 23-48; iyo Yerusaaalem, 11:1-18; 12:1-17.

Qaybtani aad ayey muhiim u tahay maxaa yeelay waxa ay ka hadlaysaa halgalkii socday eek u aaddanaa dadkii aan Yuhuudda ahayn iyo Butros qaybtiisii (isagoo ahaa madaxa kooxda Rasuullada) ee halgankaas dhexdiisa. Luukos waqxa uu tix gelinayaa in qaybtan Korneliyas ay aad muhiim u tahay in saddex jeer lagu soo celceliyo qaybtan dhexdeeda.

NASB (UPDATED) TEXT: 9:32-35

³²Oo waxaa dhacay intuu Butros marayay dhinacyada oo dhan inuu u yimid qoduusiintii Ludda degganayd. ³³Halkaasna wuxuu ka helay nin la odhan jiray Ayne'as. kaas oo siddeed sannadood sariirtiisa jiiifay. maxaa yeelay, curyaan buu ahaa. ³⁴Markaasaa Butros wuxuu ku yidhi. Ayne'asow, Ciise Masiix baa ku bogsinaya; kac oo sariirtaada gogol. Oo markiiba wuu kacay. ³⁵Kuwii Ludda iyo Sharoon degganaana waa arkeen, oo Rabbigay u soo jeesteen.

9:32 “Butros waxa uu mrayey” Sida cad Rasuulladu waxa ay wacdinayeen Falastiin ee waddammada deriska la ah.

▣ **“qoduusiintii”** Ereygan waxaa Falimaha Rasuullada dhexooda loogu isticmaalay in qeexo kaniisadda. Mawduuc Gaar ah ka eeg: Qudduusiinta 9:13 Ereyga ah “xerta” waxaa si tartiib ah loogu beddelay ereyga “qudduusiin.” Ereygu waxa uu la xidhiidhaa erey Axdigii Hore la adeegsaday oo ingiriis ahaan ah “holy” oo macnihiisu yahay in gooni la si gooni ah loo gaar yeelo Shaqada Ilaah. Th marna looma keli ahaan jamac mooyaane hal mar oo ku jirta Filiboy. 4:21It taasoo ah iyana ah macne guud oo wada socda ama isku xidhan.Tani waxa au tilmaamaysaa in qudduus la miqdo in ay ka dhigan tahay in “bulsho laga mid noqdo.”Mawduuc Gaar ah ka eeg: 9:13. Rumaystayaasha oo dhan waxaa loogu yeedhaa “qudduusiin” Axdiga Cususb dhexdiisa! Waa booskeenna aan ku leenahay Masiixa oo la muujinayo.

MAWDUUC GAAR AH: QUDUUSNAANTA

Axdiga Cusubi wuxuu inoo sheegayaa marka denbiilayaashu usoo laabtaan Ciise Masiix ee ay towbad keenaan, in markaas xaq laga dhigi doono. Waxay tan ku helayaan Masiixa, maxaa yeelay xaqnimadiisa ayuu iyagana gelinayaa (Rooma 4). Waxa ay noqonayaan kuwo xaq ah oo quduus ah.

Laakiin sidoo kale Axdiga Cusubi waxa uu rumaystayaasha farayaa inay noqdaan kuwo camal suubban leh. Shaqada Masiixu qabtay waa mid iyaga xaq ka dhigtay, laakiin haddana fikirkooda iyo qaab nololeedkuudu waa inuu ahaado la midnimada Masiixa. Sida badbaadadu u tahay hadiyadda oo qiimahana u leedahay, ayaa qaab nololeedkuna la rabaa inuu ahaado taas oo kale.

Ka jawaab bixinta asalka ah

Falimaha Rasuullada 20:23; 26:18
Rooma 15:16
1 Korintos 1:2-3; 6:11
2 Tesaloniika 2:13
Cibraaniyada 2:11; 10:10,14; 13:12
1 Butros 1:1

La midnimada Masiixa

Rooma 6:19
2 Korintos 7:1
1 Tesaloniika 3:13; 4:3-4,7; 5:23
1 Timoteyos 2:15
2 Timoteyos 2:21
Cibraaniyada 12:14
1 Butros 1:15-16

▣ **“Ludda”** MAgaalada Ludda waxa ay ku tiil waddada uu ganacsigu soo maro ee u dhexaysa Baabuloon iyo Masar. Axdigii Hore dhexdiisa waxaa loo yaqaannay “Lod” (cf. I Taariikhda. 8:12). Koow iyo toban mayl ayey ka fogayd badda Medhitareeniyanka. Tani waa iska meeshii uu Filibos booqday sida ku jirta cutubka 8:40.

9:33 “nin la odhan jiray Ayne'as” Magaciisa afka Giriigga waxa uu ahaa “ammaan.” In uu yahay rumayste iyo in kale kalama cadda, laakiin Butros waxa uu dib u soo booqanayaa kaniisadihii uu Filibos soo aasaasay ama bilaabay.

▣ **“kaas oo siddeed sannadood sariirtiisa jifay. maxaa yeelay, curyaan buu ahaa”** Tarjumaaddani waa tafsiirka ugu caansan eek u jira weedha Giriigga (NASB, NKJV, NRSV, TEV, NJB). Arrintu si kastaba ha ahaatee, weedha Giriigga macnaheedu “laga soo bilaabo markuu siddeed jir ahaa” (cf. Newman and Nida, *A Translator's Handbook on The Acts of the Apostles*, p. 199).

9:34 “Ciise Masiix baa ku bogsinaya” Halkan wax qodob ah kuma sida “the”, kaasoo tilmaami lahaa in labadan erey ay noqdeen kuwo si guud loo wada yaqaan. Waa hab macne ahaaneed oo loo yaqaan AORISTIC PRESENT ama Fal tegay oo taagan, oo macnihiisu yahay “Mar ahaantanba Masiixa ayaa ku badbaadinaya.

▣ **“kac oo sariirtaada gogol”** Han waxaa ku jira labo erey oo fal tegay oo toosan oo amara ah kuwaasoo muujinaya awood iyo degdegsiinyo!

▣ **“Oo markiiba wuu kacay”** Tani waxa ay muujinaysaa ninkii rumaysadkiisa uu uga jawaabay farriinta Butros ee Ciise ku saabsan.

9:35 “Kuwii Ludda degganaana oo dhan” Ereygan “dhammaan” tusaale aad u muhiimsan ayuu u yahay Baybalka (cf. Bilowgii. 41:37; Sharciga Ku Noqoshadiisa. 2:25; Luukos 2:1; Rooma. 11:26).

▣ **“Sharoon”** Tani waxa ay tilmaamaysaa xeebta waqooyi ee ballaadhan ee Falastiin. Waxa ay soddon mayl ku dherersan tahay inta u dhexaysa Ludda iyo Kaysariya

“oo Rabbigay u soo jeesteen” Ereyga “usoo laabasho” waxa uu abbaarayaa tawbadkeenka (*shub*). Waxa uu tilmaamayaa in dembiga laga soo laabto iyo in “tawbadkeen” iyo “rumaysad” loo yeesho Rabbiga (cf. 11:21). Thadalkan la soo koobay dhowr meelood ayuu kaga jiraa qaybtan, kuwaasoo muujinaya dhaqdhaqaaqa weyn ee Ruuxa Ilaah uu Butros soo mariyey ee goorkii dambe u gudubtay Bawlos. Dhacdadan mucjiseda leh waxa ay irrida u furtay shaacinta injiilka!

MAWDUUC GAAR AH: TAWBADKEENKA SIDA UU UGU JIRO AXDIGII HORE IN THE OLD TESTAMENT

Arrintani waa muhiim laakiin waa ay adag tahay in ala qeexo. Sida aan u badan nahay waxaan haysannaa qeexitaan ay kooxdeenu ku dhaqanto. Arrintu si kastaba haahaatee, waxaa jira “hab” qeexitaan fiqi ahooga laga soo rogay dhowr erey oo Cibraani iyo (Giriig)ah laakiinse aan si qaas ah u tilmaamayn qeexiddan. Waa in la xusuusnaadaa in qorayaashii Axdigaq Cusub (marka Luukos laga reebo) ay ahaayeen kuwo fikirkoodu ku salaysnaa afka Cibraaniga oo isticmaalaya ereyada Greek Koine, markaa meesha laga bilaabay waa ereyada Cibraaniga qudhoda oo bilowga koowaadba ay jiraan labo.

1. *nhm* (BDB 636, KB 688)

2. *swb* (BDB 996, KB 1427)

Kan koowaad, *nhm*, oo asal ahaan u muuqda in loola jeeday in uu sawiro neefsi qoto leh, waxaa la adeegsaday dhowr jeer.

a. “nasiino” ama “raaxo” (e.g., Bilowgii. 5:29; 24:67; 27:42; 37:35; 38:12; 50:2; waxaa had sida badan

lagu adeegsaday magacyo dhexdood, cf. II Boqorrada. 15:14; I Taariikhda. 4:19; Nexemyaah. 1:1; 7:7; Naaxuum 1:1)

- b. “Ka murugoosho” (e.g., Bilowgii. 6:6,7)
- c. “Maskax beddelan” (e.g., Baxniintii. 13:17; 32:12,14; Tirintii. 23:19)
- d. “Naxariis” (e.g., Sharciga Ku Noqoshadiisa. 32:36)

Xusuusnow in kuwan oo dhan uu dareen qoto dheeri uu ku jiro! Kuwan ayaa fure u ah: Dareen qoto leh oo sabab in ficil ahaan uu u soo baxo is beddelan ficilka noqonaya waxa uu badanaa ku jahaysmaa dad kale, laakiin sidoo kale Ilaah waa uuku jahaysnaan karaa. Waa is beddelkqan maanka iyo ficilka ku aaddan Ilaah ayaa ah tan saamaynasa ereygan in uu lahaado muhiimad fiqi ahaaneed. Laakiin halkan waa in taxaddar laga muujiyaa. Ilaah ayaa la leeyahay ha loo “tawnad keeno” (cf. Bilowgii. 6:6,7; Baxniintii. 32:14; Jdgs. 2:18; I Samuu’eel. 15:11,35; Sabuurrada. 106:45), laakiin tan natiijadeedu ma aha mid ka imanaysa murugo dembi ama qalad, laakiin waa qaab muuqda oo ah muujinta Ilaah naxariistiisa iyo daryeelkiisa (cf. Tirintii. 23:19; I Samuu’eel. 15:29; Sabuurrada. 110:4; Yeremyaah. 4:27-28; Yexesqeel.24:14). Marka la eego ciqaabta dembiga iyo fallaagonimada waa la cafinayaa haddii dembiiluhu uu si run ah uga soo laabto dembigiisa/dembigeeda oo ay Ilaah u soo laabtaan.

Ereygani boos macne weyn ayuu ku fadhiya: Macnaha guud ee qoraalka ku jira ayaa lagu go’aaminayaa macnaha loogu talo.

Ereyga labaad, *swb*, macnihiisu waxaa weeye “soo noqosho” (ka soo laabasho, dib uga soo laabasho, usoo laabasho). Haddii ay run tahay in labada axdi ee la doonayo ay yihiin “tawbadkeen” iyo “rumaysad” (e.g., Matayos. 3:2; 4:17; Markos 1:4,15; 2:17; Luukos 3:3,8; 5:32; 13:3,5; 15:7; 17:3), dabadeed *nhm* waxa ay u taagan tahay dareenka adag ee ah xaqiiqsashada in qofku uu debigiisa ka soo laabto dembiga oo uu Ilaah usoo laabto (hal tusaale oo ku saabsan labadan ficil ee Ruuxiga ah ayaa waxa ay ku jiraa Caamoos 4:6-11, “adigu Iima aadan soo laaban” [shan jeer] iyo Caamoos 5:4,6,14, “I doondoona. .doondoona Rabbiga. .wanaahha raadi ma aha sharka”).

Tusaalaha ugu korreeya ee ugu weyn ee awoodda tawbadkeenku waa dembigii Daa’uud la sameeyay Betshabaca (cf. II Samuu’eel 12; Sabuurrada 32,51). Waxaa jiray cidhib xumooyin is daba joog ah u haa Daa’uud, qoyskiisa, iyo reer banii Israa’iil, laakiin Daa’uud waa uu soo laabtay si uu wehelnimo Ilaah ula lahaado! Xitaa Manaasee-ha sharka lagu waa uu tawbad keeni karaa waana la la cafinayaa (cf. II Taariikhda. 33:12-13). Ereyada labadoodaba si wada jirro ah ayaa loogu isticmaalayaa gudaha Sabuurka. 90:13. Tani waa in ay ahaataa xaqiiqsasho dembi iyo qasdi, si shaqsi ahaaneed oo looga soo laabtooo taa beddelkeeda la raadiyo dareen raadinta Ilaah iyo xaqnimadiisa (cf. Ishacyaah. 1:16-20). Tawbadkeenku waxa uu leeyahay dhinac dareen, dhinac, shaqsiyadeed, iyo dhinacniyad ahaaneed. Saddexdanba waa la doonayaa, ila bilaabo xidhiidh cusub oo Ilaah lala yeelanayo iyo in lagu socdo oo aan laga leexan xidhiidhkaas. Dareen qoto dheer oo looga shallaynayo dembiga looga soo laabanayo waxa ay noqotaa oo isku beddeshaa in gaar ah waqti loo siiyo Ilaah!

NASB (UPDATED) TEXT: 9:36-43

³⁶Haddaba waxaa Yaafaa joogi jirtay naag xer ah oo la odhan jiray Tabita taasoo micneheedu yahay Dorkas. Naagtaas waa camal wanaagsanayd, sadaqooyinna waa bixin jirtay. ³⁷Wakhtigaas waxaa dhacday inay bukootay, wayna dhiimatay, kolkay maydheenna waxay dhigeen qollad sare. ³⁸Dhowaantii ay Ludda u dhowayd Yaafaa aawadeed, xertii markay maqleen in Butros halkaas joogo, waxay u direen laba nin iyagoo ka baryaya oo leh, Ha ka raagin inaad noo timaadid. ³⁹Markaasaa Butros kacay oo raacay iyagii. Oo kolkuu yimidna, waxay geeyeen qolladdii sare; carmalladii oo dhammina waa ag taagnaayeen iyagoo ooyaya oo tusaya garbageliyaashii iyo dharkii Dorkas samaysay intay la joogi jirtay iyaga. ⁴⁰Laakiin Butros baa dhammaantood dibadda u saaray, markaasuu jilba joogsaday oo duceeyey, oo intuu meydka xaggiisa u jeestay ayuu ku yidhi, Tabitay, kac. Markaasay indhihii kala qaaday; oo markay Butros aragtayna way fadhiisatay. ⁴¹Markaasuu gacan siiyey oo kiciyey; oo markuu u yeedhay qoduusiintii iyo carmalladiiba, iyadoo nool ayuu hor taagay. ⁴²Taasna waa laga wada ogaaday Yaafaa oo dhan; kuwa badanna waa rumaysteen Rabbiga. ⁴³Waxaana dhacday inuu maalmo badan Yaafaa la joogay nin la yidhaahdo Simoon oo megdeeye ah.

9:36 “Yaafaa” Maanta magaaladan waxaa loo yaqaan Jafa (*Yafu*) Waxa ay ahayd magaaladii dekada u ahayd Yerusaaalem. Maanta waxa ay ka tirsan tahay magaaladda casriga ah Talaabiib.

▣ **“xer”** Ereyga “xer” waxaa aad loogu dhex isticmaalayaa qaybtan Falimaha Rasuullada waxa ay macne ahaan tilmaamaysaa “barte,” laakiin waxaa sidoo kale loo isticmaalayaa rumaystaha.

▣ **“Tabita. . . Dorkas”** Gabadhan magaceedu waxa uu luuqadda Aramaygga ku ahaa *Tabitha* Afka Giriiggana waxa uu ku ahaa *Dorcas*. Yuhuudda ganacsatada ah ee ku xidhan dadka aan Yuhuudda ahayn waxca ay lahaayeen labo magac, magac Aramayg ah iyo magac Giriig ah. Magacyadan labaduba waxaa weeyaan “gazelle” calaamad u taagan Nimco iyo qurux (cf. Gabaygii Sulaymaan 2:9, 17; 4:5; 7:3).

▣ **“Camallo naxariis iyo sadaqo bixin ah”** Tani waxa ay u taagan tahay saddaqo bixinta Yuhuudda. Tani waxa ay ahayd ujeedka qaaraanka Yuhuudda ee toddobaadlaha ah ee lagu horumariyo sunagogga iyo daryeelka dadka Yuhuudda ah ee baahan ee ku jira bulshada. Waxaa ah Yuhuuddu middan u tix gelin jireen in ay muhiim u tahay Maalinta Ciise Kaniisaddu waa ay raacday tilmaantan (cf. Fal 6). Mawduuc Gaar ah ka eeg: 3:2.

▣ **“which she continually did”** Kani waa Fal tegay oo socda oo wax caddaynaya. Waxa uu ka hadlayaa fal waqti la soo dhaafay taagnaa oo socday. 155

9:37 “kolkay maydheenna waxay dhigeen qollad sare” Maydhidda qofka dhintay waxa ay ahayd in qofka loo diyaariyo aaska. Yerusaaalem dhexdeeda waxa ay ahayd in qofka lala aaso qofka kale ee ay isku maalinta dhintaan.. laakiin wuxuu Yerusaaalem ka baxsan waxa ay ahayd in aaska saddex maalmood dib loo dhigo. Mawduuc Gaar ah ka eeg: 5:6.

9:38 “waxay u direen laba nin” Rumaystayaashani waxa ay maqleen in Ilaah uu sameeyay mucjisooyin waaweyn isagoo Butros soo marinaya waxayna aammineen in uu wax u samayn karay marwadan Masiixiyadda Yuhuudda ah.

9:39 “carmalladii oo dhammina waa ag taagnaayeen” sida cadawaxa ay xidhnaayeen dhar ay Dorkas uyaga u samaysay oo labo nooc ah: (1) Dharka hoosta laga xidho iyo (2) kuwa dusha sare laga xidho..

9:40 “laakiin Butros baa dhammaantood dibadda u saaray” Tani macnaheedu waxaa weeye “Dibad u saaris.” Xaqiiqdii tani waa sidii uu Ciise sameeyay sida ku qoran Mark 5:40. Sida dhacday, waxaa jira isla mid ahaansho weyn weyn oo ka dhaxaysa mucjisooyinka ku jira qaybtyan iyo mucjisooyinkii uu Ciise Sameeyay xilligii uu duniada joogay. Adeeggii Ciise ayuu ahaa kii ay ay Rasuulladu ku dayan jireen. Su’aaashu waxa ay tahay, “maxay ahayd sababtii uu Butros u doonayey dhammaantood ay qolka ka baxaan?” Maxaa yeelay Ciise waxa uu tan u sameeyay, ma uusan doonayn in la ogaado in la ogaado in uu wax bogsiiyo oo qura oo uusan injiilkuna uusan kaamil ahayn. Laakiin muxuu Butros tan u sameeyay? Waxa ay u muuqataa in mucjisooyinkan ay rumaysadka waddo u fureen, sidaas darteedna waxa ay u muuqataa in mucjisooyinku ay fureen waddadii rumaysadka, oo uu doonatey inuu sida ugu macquulsan u tusaaleeyo ama ugu muujiyo.

▣ **“jilba joogsaday”** Booska caadiga ee tukashada Yuhuuddu waxay ahayd in la istaago iyadoo gacmaha iyo indhaha samada loo taagayo. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Kitaabka Falimaha Rasuullada dhexdiisa, dhowr jeer ayaa lagu diwaan geliyay in ay xertu jilba joogsadeen si ay u tukadaan. Tani waxa ay sida cad xoojin u ahayd (cf. 7:60; 20:36; 21:5), sidii markii ay Ciise la jooheen beertii Getsamene (cf. Luukos 22:41).

▣ **“Tabitay, kac”** Waxaa cad in uu ku hadlayey Afka Aramaygga. Ciise iyo Yuhuuddii joogtay Falastiin waxa ay ku hadlayeen luuqadda aramaygga, laakiinse ma ahayn afka Cibraaniga. Tani xitaa waa run ku jirta marka aad luugu durko Cesraa illaa Nexemyaah (cf. Nexemyaah. 8:4-8).

9:41 “qodusiintii” Mawduuc Gaar ah ka eeg Quddusiinta: 9:13.

42 Taasna waa laga wada ogaaday Yaafaa oo dhan; kuwa badanna waa rumaysteen Rabbiga. 43 Waxaana dhacday inuu maalmo badan Yaafaa la joogay nin la yidhaahdo Simoon oo megdeeye ah.

9:42 “kuwa badanna waa rumaysteen Rabbiga” Tani hadal kale oo la soo koobay oo muujinaya natiijooyinka waaweyn ee Butros mucjisooyinkiisii iyo adeeggiisii wacdiga. Mawduuc Gaar ah ka eeg: 2:40 and 3:16.

9:43 “Waxaana dhacday inuu maalmo badan Yaafaa la joogay nin la yidhaahdo Simoon oo megdeeye ah.” Butros xeerkiisii sharciga Yuhuudda waa ka jabay durtadiiba sida inuu la joogo nin sidan oo kale aan nadiif ahayn oo magdeeye ah (waxa ay ahayd inuu ka shaqeeyo saamo magdaynta) sida Simoon oo kale.

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay tahay sababta Bawlos soo Masiixiyobiddiisa loogu diwaan geliyey saddex jeer Falimaha Rasuullada dhexdooda?
2. Sababtee ayaa saddexdii qaab ee soo Masiixiyobidda Bawlos ay u kala dawanaayeen?
3. Intee doorasho ayuu Bawlos hastaasoo Masiixiyobiddiisa? Ma in wixii uu soo maray loo arkaa wax iska caadi ah?
4. Maxay Yuhuuddii qurba-joogtu isugu dayeen in ay dilaan Bawlos?
5. Haddii Butros iyo Bawlos ay adeegsadeen mucjisooyin injiilka waddada u furaya, muxuusan Ilaah u isticmaalin maantadan aan joogno qodobkan isaga ah?

FALIMAHA RASUULLADA 10

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Butros iyo Korneeliyos	Korneeliyos oo Wafdi Diraya	Masiixiyoo biddii Korneeliyos	Butros iyo Korneeliyos	Butros oo Booqanaya Boqol u taliye Rooman ah
10:1-8	10:1-8	10:1-8	10:1-3	10:1-2 10:3-8
			10:4a 10:4b-8	
	Butros Aragtidii		10:9-13	
10:9-16	10:9-16	10:9-16	10:14 10:15-16	10:9-16
	Amarkii Kaysar			
10:17-23a 10:23b-33	10:17-23	10:17-23a	10:17-18 10:19-21 10:22-23a	10:17-23a
	Butros oo la Kulmay Korneeliyos	10:23b-29	10:23b-29	10:23b-33
	10:24-33			
		10:30-33	10:30-33	
Butros oo Guriga Korneeliyos ka dhex hadlaya	Wacdintii Korneeliyos Qoyskiisa		Hadalkii Butros	
10:34-43	10:34-43	10:34-43	10:34-43	Butros oo Tilmaansanaya Guriga Korneeliyos
				10:35-43 10:36-43
		10:44-48		
Kuwii aan Yuhuudda ahayn oo Helay Ruuxa Qudduuska ah	Rooxa Qudduuska ah oo Ku Soo Degay Kuwii aan Yuhuudda ahayn		Dhaweeyay Ruuxa Qudduuska ah	Baabtiiskii ugu Horreeyay ee Kuwii aan Yuhuudda ahayn
10:44-48	10:44-48		10:44-48	10:44-48

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Injiilku waxa uu asalnimada Yuhuudda soo saarayaa The gospel is breaking out of its Jewish origins.
 1. Korneliyos Askari Roomaan ah oo Ilaah ka cabsada
 2. Enooggii Itoobiyaankaaaa Waa nin aan Yuhuudi ahayn oo Ilaah ka cabsada
- B. Shaqadii Yuhuuddii afka Giriigga ku hadlaysay (sida toddobadii ku jirtay Falimaha Rasuullada 6) saamayn ayuu ku leeyahay.
- C. Soo noqnoqoshada Beentakostiggu waxa ay sida Ilaah dadka oo dhan raalliga uga noqday u muujinaysaa
 1. Reer Samaariya (cutubka 8)
 2. Roomanka (cutubka 10)
 3. Itoobiyaanka (cutubka 8)
- D. Heerka fiqi ahaaneed waxaa lagu dejiyey golaha Yerusaaalem sida ku jirta cutubka 15aad. Hadhka hooska biyaha ee injiilka caalamiga ah awooddiisii ayaa la gaaray.

NASB (UPDATED) TEXT: 10:1-8

¹Haddaba waxaa Kaysariya joogay nin la odhan jiray Korneeliyos, oo taliye u ahaa boqol askari oo la odhan jiray Ciidankii Talyaaniga. ²Ninkaasu nin cibaadaysan buu ahaa. oo Ilaah buuna ka cabsan jiray, isaga iyo gurigiisuba. dadkana sadaqooyin badan buu siin jiray, oo had iyo goorna Ilaah buu baryi jiray. ³Abbaaraha sagaalka saacadood oo maalmeed wuxuu riyo bayaan ugu arkay malaa igtii Ilaah oo u soo gelaya oo ku leh isaga. Korneeliyosow. ⁴Markaasuu aad u fiiriyey isagoo cabsanaya oo wuxuu ku yidhi. Waa maxay, Rabbiyow? Markaasay ku tidhi. Baryooyinkaaga iyo sadaqooyinkaaga waxay Ilaah hortiisa u baxeen xusuus. ⁵Haddaba waxaad niman u dirtaa Yaafaa inay u soo yeedhaan Simoon kan la yidhaahdo Butros. ⁶Wuxuu marti u yahay nin Simoon la yidhaahdo oo megdeeye ah oo gurigiisu ku yaal badda dhinaceeda. ⁷Oo kolkii malaa'igtii isaga la hadashay ka tagtay. wuxuu u yeedhay laba midiidin iyo askari cibaadaysan oo ka mid ah kuwa had iyo goorba u adeegi jiray; ⁸oo markuu wax walba u sheegay, ayuu wuxuu u diray Yaafaa.

10:1 “waxaa Kaysariya joogay nin” Masiixi noqoshada Korneeliyos waxa ay ahayd dhacdo weyn. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waa in la xusuunaadaa in uusan ahayn arrintii caqabadda ugu horraysay ee injiilka oo laga guulaystay..

1. Tan koowaad waxa ay ahayd reer Samaariya

2. Dabadeed waxaa jiray Eenooggii Itoobiyaanka ahaa kaasoo sidoo kale macquul ahayd in uu nin Ilaah ka cabsada ahaa.
3. dabadeedna Korneeliyos, oo inuu Yuhuudi uusan ahayn oo qura aysan ahayne, ahaa ahaa sarkaal ciidanka Roomanka ah oo qayb ka ahaa ciidankii soo buuxiyay dhulkii ballan-qaadka.

Xoojinta arrintani ma aha mid si weyn ugu saabsan “Korneeliyos” Masiixiyoobiddiisii, maxaa yeelay horayba Ilaah waa uu uga cabsan jiray, sidii Enooggii itoobiya, laakiin tirade badan ee qoyska iyo saaxiibbada magu sheegay aayadadaha. 1,24,27,44,48, kuwaasoo sidoo kale badbaaday. Butros waxa uu arrintan la xidhiidhinayaa golaha Yruusaalem sida ku jirta Falimaha Rasuullada 15:7-9 waxa ayna dejinayaan heerkii ay hawshii gaadhista dadka aan Yuhuudda ahayn ee kaniisadda.

▣ **“Korneeliyos”** Sharrax gaar ah ayaa ku jirta F. F. Bruce’s *Commentary on the Book of the Acts*, p. 214, waxaa ku qoran “in magaca Korneeliyos uu ahaa magac guud oo gaara ka ahaa Rooma dhexdeeda sida Publius Cornelius Sulla ee 82 B.C. ee la xoreeyay 10,000 addoommo ah kuwaasoo magacoodii lagu daray qabiilka *gens Cornelia*, oo lahaa iyaga.” *Gens* waxa ay ahaayeen qabiil ama koox qoysas ah kuwaasoo wadaaga magac guud oo rumaysan qof geesi ah oo awoowayaashood ka tirsanaa sida middan oo kale.

▣ **“Boqol u taliye”** Boqol u taliyeyaasha dhowr jeer ayaa lagu sheegay Axdiga Cusub dhexdiisa waa mid had iyo jeer muuqata (cf. Matayos. 8:5; Luukos 7:2; 23:47; Fal 10:1; 22:5; 27:3; etc). farsamo ahaan waxa ay ahaayeen hoggaamiyeyaasha boqol nin; ha yeeshee, waxa ay ahaayeen saraakiil aan wakiillo ahayn, oo la mid ah sida saajinnadeenna oo kale.

▣ **“Ciidankii Talyaaniga ”** Had iyo jeer ciidanka Roomaanka qaybteedu waxa ay ka koobnayd 600 oo nin. Qaybtan gaarka ah waxa laga dhigay kun askari oo Rooman ah oo iskood-wax-u-qabso ku shaqaynaya kuwaasoo la dejiyey Suuriya. Waxaan ku og nahay dhacdada taariikh ahaaneed ee in iyaga loofu yeedhi jidhay ciidan caawiyeyaasha ah. Waxaa macquul ah in ay ahaayeen kuwa fallaadhaha iyo waranka ku dagaallama. Ciidankaa Talyaaniga waxaa la dejin jiray Falastiin sababtuna waxa ay ahayd fallaagonimada Yuhuudda.

10:2 “nin cibaadaysan” Saddex qaab ayey ninkan cibaadadiisu ahayn oo ay u qeexan tahay:

1. Ilaah ayuu qaddariyey (ka eeg tusmada sharraxa aayadda. 22) oo wuxuu ku qaddariyey qoyskiisii oo dhan
2. waxa uu ahaa mid had iyo jeeraale dhexdhexaad u ah camalladiisa sida sadaqo siinta dadka
3. waxaa dabeecad u ahayd in uu mar kasta Ilaah baryo (cf. aayadda. 22; 13:16,26).

Ninkanu waxa uu diin ahaan, dareen ahaan, iyo bulsho ahaanba uu ku xidhnaa sunnagoogyada. inastoo uusan dhammaan wada Masiixiyoobin. In qof uu wada masiixiyoobo waxa ay ahayd

1. in la gudo haddii uu nin yahay
2. in dadka hortooda lagu baabtiiso iyadoo ay marqaatihyo joogaan
3. haddii ay macquul tahay inuu waaqdaac geeyo Macbudka

Arrintani dad badan oo aan Yuhuud ahayn oo xiisaynayey in Yuhuud laga dhigo ayey ka hor istaagtay.

▣ **“isaga iyo gurigiisuba”** Tani waa sheegidii ugu horraysay ee qoys lagu wada sheego in ay reer diimeed yihiin oo waxaan aalaaba ka heli karnaa Kitaabka Falimaha Rasuullada (cf. Fal 10:2; 11:14; 16:15, 31; 18:8). Waxa ay muujinaysaa in dhaqan ahaan macnaha guud ee rumaysadka aabbuhu uu ahaa rumaysadka qoyska iyo xitaa qoyska ku xidhan oo ay shaqaaluhu ku jiraan.

▣ **“sadaqooyin badan”** Tani waxa ay la xidhiidhaa sadaqo bixinta. Marka xagga Yuhuudda la eego tani waxa ay muujinaysaa in Korneeliyos uu qayb firfircoon ka ahaa sunagoogga oo si cad na u ahaa mid Ilaah ka cabsada. Mawduuc Gaar ah ka eeg: Sadaqo Bixinta 3:2.

▣ **“oo had iyo goorna Ilaah buu baryi jiray”** Halkan waxaa ku jira saddex fal oo taagan oo is beddelay. Ficalka kaalmo bixinta ee socda ee muujinaya Korneeliyos wanaaggiisa.

1. ka cabsasho, Fal taagan oo heerka dhexe ah
2. Sadaqo bixin. Fal taagan oo toosan

3. Ilaah bari. Fal taagan oo heerka dhexe ah

Ninkan cibaadadiisu waxa ay mid shaqsi ahaaneed oo maalin kasta socota. Waxa ay samaynayey labada shay ee ay culimada diinta Yuhuuddu sida ugu badan u xurmayn jireen sida—sadaqo bixinta iyo salaadda.

10:3 “Abbaaraha sagaalka saacadood” Tani waxa ay la xidhiidhaa waqtiga fiidka sadaqada la bixiyo (i.e., 3 p.m., cf. Baxniintii. 29:39, 41; Tirintii. 28:3-31; I Boqorrada. 18:29-36; Sabuurrada. 55:17; 141:2; Daanyeel. 6:10; Josephus *Antiq.* 11.4.1; *Wars* 1.1.1). Tani waxa ay ahayd waqti dhaqameed loo gooyay salaadda.

▣

NASB, NRSV,

TEV

“Bayaan ugu arkay”

NKJV

“si bayaan ah u arky”

NJB, NIV

“si cayiman u arkay”

Kutubta Injiillada dhexdooda ereyga Falkaabaha ah *phanerēs* xagga luuqadda Giriiga macnihiisu waxaa weeye ama uu si guud u tilmaamayaa muuqaal ama aragti wax loo jeedo (cf. Markos 1:45; Yooxanaa 7:10). Muuqaalkani waxa uu yimid saacaha maalinta ee uu iftiinku jiro waxa uuna ahaa mid gaar ah oo cayiman.

▣ **“wuxuu riyo bayaan ugu arkay malaa igtii Ilaah”** Marka dhinacyada qaar laga eego Masiixiyobiddani waa sida middii Sawlos oo kale. Qofkani waxa uu si cibaado leh u ahaa nin diimeed. Ilaah waxa waxa uu soo diray wakiil weyn oo isaga ku toosiga rumaysadka ama iimaanka. Kumaa odhan karay “Maya”? Masiixiyobidyadani waxa ay calaamad u yihiin doorashada Ilaah, ee ma aha doonista xorta ah ee aadanaha. Dadkani waxa ay ka jawaab celinayaan dhacdada weyn iyo runta la soo arkay eek u jira injiilka.

10:4 Farriinta Malaa’igtu waxa ay ka koobnayd labo erey oo la xidhiidha qurbaan bixinta: “kor aadid” iyo “Ilaah hortiisa xusuus ku ah.” Waxaa cad in Ilaah aqbalay ninkan caabudaaddiisa (i.e., salaad iyo sadaqo bixin) xataa intii uusan injiilka maqal ka hor.

▣ **“aad u fiiriyey isagoo cabsanaya”** Ka eeg Sharraxa 1:10.

▣ **“Waa maxay, Rabbiyow”** Waa ay adag tahay in la ogaado sidii loo tarjumi lahaa ereygan Rabbi. Waxaa loola jeedi karaa (1) “mudane” ama “taliye” ama (2) “Rabbi” ama “Sayid” xagga fiqigana waa musande/milkiile/ka awoodda ugu sarraysa leh. qoraallo kale oo awood weyn muujinaya waa Yooxanaa 4:1,11,15,19,49.

Falimaha Rasuullada dhexdooda waxaa jira wax kale oo suuragal ah oo ku jira. Korneeliyos waxa uu malaa’igta ugu yeedhay Rabbi (cf. Muujintii. 7:14) Butros-na waxa uu ugu yeedhayaa “codka” (cf. 10:13,15) isagoo ka wada Rabbi (cf. 10:14). Haddaba, ereygu waxa uu khusayn karaa wax kasta oo awood rabbaaniya ama Ilaah ka timid ah, haddii si shaqsi ah loo caddeeyo, waxa ay si gaar ah tilmaamaysaa Ciise. Sida ku jirta 8:26 iyo 29 waxaa malaa’igta Rabbiga lagu sheegay in ay xidhiidh la leedahay Ruuxa Qudduuska ah. Kala duwanaanshan iyo is beddelkan oo kale waxa uu ka dhex dhacay “codka” iyo Ruuxa sida ku jirta 10:13,14,15 iyo 19,20.

10:5 “waxaad niman u dirtaa Yaafaa” Kani waa fal dhammaaday oo heerka dhexe ah oo tilmaamaya amar. Ogsoonow injiilka lama aysan wadaagin, laakiin Butros ayey u dirtay. Ilaah aalad ahaan wuu u adeegsadaa aadanaha (cf. Baxniintii. 3:7-10). Ninkani in kastoo uu ahaa nin diimeed cibaado leh (oo sidii Sawlos oo kale ah), wuxuu u baahnaa in uu maqlo oo uu u jawaabo injiilka Ciise Masiix.

10:7 “wuxuu u yeedhay laba midiidin iyo askari cibaadaysan” Tani waxa ay samaynasaa qayb saddexaad; hase yeeshee, aayadda 19-aad dhexdeeda waxaa lagu sheegay labo iyaga ka mid ah. Waxaa macquul ah in askarigu uu ahaa waardiye oo labadii midiidin ee qoyskiisa ka midka ahaa ay hadleen.

10:8 Korneeliyos qoyskiisa iyo saaxibbadiisba waa ay ku la jireen rumaysadkiisa. Ninkani waxa uu sameeyay wixii uu rumaysnaa. Bulshada oo dhan ayaana isaga awgiis rumaysadka u qaadan lahayd. Saddexdan nin waxa ay

ahayd in ay habeen oo dhan sii socdaan iyagoo la yaabay oo ka wada hadlay farriintii malaa'igta iyo rumaysadkii taliyahoodii saaxiibkood ahaa.

k

NASB (UPDATED) TEXT: v10:9-16

⁹Haddaba maalintii dambe intay safrayeen oo magaalada ku soo dhowaanayeen. ayaa Butros wuxuu tegey gurigii dushiisa inuu ku tukado abbaaraha saacaddii lixaad, ¹⁰waana gaajooday oo wuxuu doonayay inuu wax cuno; laakiin intay wax u diyaarinayeen ayuu riyooday, ¹¹wuxuuna arkay samada oo furantay, oo waxaa soo degayay weel sida shiraaq weyn oo kale oo afartiisa geesood loogu soo dejinayo dhulka: ¹²oo waxaana ku jiray jinsi kasta oo xayawaan afar lugood leh iyo waxa dhulka gurguurta iyo haadda cirka. ¹³Oo waxaa isaga u yimid cod leh, Kac, Butrosow: gowrac oo cun. ¹⁴laakiin Butros wuxuu yidhi, Saas aynan noqon, Rabbiyow, maxaa yeelay, weligay ma aan cunin wax xaaraan ah oo aan nadiif ahayn. ¹⁵Mar labaad codkii baa u yimid isagoo leh. Wixii Ilaah nadiifiyey, xaaraan ha ka dhigin ¹⁶Taasuna waxay dhacday saddex goor: markiibana weelkii waa loo qaaday samada.

10:9 “inuu ku tukado abbaaraha saacaddii lixaad” In kastoo Yuhuuddii rabbaanigu ay meel iska dhigeen in ay 9:00 a.m. iyo 3:00 p.m. ay tukadaan (xilligan oo ku beegnaa waqtiyada maalin kasta Macbudka lagu bixiyo qurbaanka), Farrisiintii ayaa waqtiga duhurka ugu daray in uu waqti kale oo gaar ah uu noqdo. Sida cad Butros waxa uu samaynayey falimihii dhaqannadii odayada isagoo duhurka ducaysanayey ama waxaa laga yaabaa in uu yara seexanayey xilli qadaha ka hor.

10:10 “waana gaajooday” Qaabka aragtida Butros waxa ay ku jirtaa macnaha guud ee qaajadiisa iyo aragtidiisa Badda Medhatareeniyanka ee uu saaran yahay dusha sare ee aqalka Simoon. Ereyga qaajo“ halkan oo qura ayaa lagu isticmaalay qorniinnada Giriigga dhexdooda. Waxa uu xaqiiq ahaan muujinaya waa la garan karaa, laakiin ereyga meeleeeyaha ah *pros* ee la socda awgiis waxaa macquul ah in laga wado “gaajo xad dhaaf ah”, laakiin waa wax la yaab leh marka macnaha guud la eego. Ereygan *hapax legomenon* (waa erey hal mar lagu dhex isticmaalay Axdiga Cusub) waa in uu ahaadaa mid aan la hubin illaa farriin laga helo.

▣ **“ayuu riyooday”** Tani waxa ay macne ahaan xambaarsan tahay “wax isaga kor uga yimid” ama “isaga wehliya,” oo had iyo goor loo isticmaalo wax lala yaabo (cf. Markos 5:42; 16:8; Luukos 5:26; iyo dhowr qoraal oo kale oo ku jira LXX). Waxaa ereyga Ingiriigiga ah ee “ecstasy” ama “farad” ereyga Giriigga ah. Aayaddan iyo aayadda 11:5 iyo 11:17 waxa uu macnahoodu yahay waxa xagga maskaxda laga ogaado oo oggolaanaysa in Ilaah la hadlo dareenka dhexe oo gudaha qofka. Kani waa erey ka duwan kii lagu isticmaalay aayadda saddexaad ee sheegaysay aragtidiisii Korneeliyos .

10:11

NASB “cirkii baa furmay”
NKJV, TEV “samo furantay”
NRSV “samada oo furantay”
NJB “Samada oo furan”

Kani waa fal mafcuulku soo horreeyo oo tegay oo aan toosnayn “samadii ayaa ku sii socotay in ay furanto.” Axdigii Hore dhexdiisa ereyga samo waa JAMAC ama wadar. Furitaankan waa hadal sarbeebed ay hawada kore ku furantay oo ku saabsan ruuxa, qiyaas aan la arki karin oo u soo baxda si muuqaal ahaaneed oo run ah (cf. Yexesqeel. 1:1; Matayos. 3:16; Markos 1:10; Luukos 3:21; Yooxanaa 1:51; Fal 7:56; 10:11; Muujintii. 4:1; 19:11).

▣ **“sida shiraaq weyn oo kale”** Kani waxa uu la mid yahay ereyga loo adeegsado ama lagu magacaabo shiraaqa maraakiibta.

10:12 “jinsi kasta oo xayawaan afar lugood leh iyo waxa dhulka gurguurta iyo haadda cirka.” Tani waxa ay la mid tahay saddexdii qayb ee xawayaanka ee lagu sheegay Bilowgii. 1 iyo 6:20. Sida cad waxa ay ka

koobnaayeen kuwo daahir ah iyo kuwo aan daahri ahayn marka la eego ama la tix raaco sharciyada cunnada ee Yuhuudda Laawiyiintii. 11.

10:13 “waxaa isaga u yimid cod” Laga soo bilaabo marka uu soo af jarmayey kitaabka Malaaki ee uu bilaabmayey xilliga Axdiga Cusub ma jirin wax cod amar ah oo Yuhuudda uga yimid xagga Ilaah. Intii xilligan lagu jiray haddii Yuhuuddu ay rabeen in ay xaqiijiyaan shayga xagga Ilaah uga yimid waxa ay ku tiirsanaayeen wax lagu magacaabo ma loo yaqaan *bath kol*. Tan Axdiga Cusub dhexdiisa waxa aan ka arki karnaa Matayos 3:17; 17:5, iyo Sidoo kale Falimaha Rasuullada 9:7, iyo meeshan.

10:14 “Saas aynan noqon, Rabbiyow, maxaa yeelay, weligay ma aan cunin wax xaaraan ah oo aan nadiif ahayn” “Saas aynan noqon” Waa weedh Giriig ah oo xooggan oo dhowr jeer lagu dhex isticmaalay Septuagint-ka oo lagu tarjumay dhowr hadal sarbeebed oo Cibraani ah. Butros waxa uu weli la hardamayey asal-raacnimadiisii Yuhuudeed. Wuxuu falimihiisa ku istaajinayey Laawiyiintii 11. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa cad in Ciise Masiix uu si qaas ah ula macaamilay arrintan marka aan eegno sida ku jirta Markos 7:14ff, gaar ahaan 19. Waxaa aad wax loo xiiseeya ah in la xusuuto in Injiilka Markos uu yahay isku ururin goor dambe ah ama muxaadarooyin kulamo ka socda Rasuul Butros oo ka yimid Rooma.

10:15 “Wixii Ilaah nadiifeyey, xaaraan ha ka dhigin” Kani waa fal taagan oo toosan oo amar ah oo ay qayb diidmo ahi la socoto, oo tilmaamaysa in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray ama coddad. Ilaah wuxuu halkan si cad ugu sheegayaa joojinta sharciyadii cunnada ee Muuse (i.e., Laawiyiintii 11). Maha kuwo ku toosan rumaystayaal sharci cusub haysta. Waxaa halkan loogu isticmaalay hab is le’eg oo lagu muujinayo sidii aadanaha oo dhan loo aqbalay!

10:16 “Tanina waxay dhacday saddex goor” Ma aha wax caan ku ah Kitaabka Qudduuska ah dhexdiisa ma aha wax si guud loogu yaqaan in salaad ama duco, ammaan ama ficillo muhiim ah saddex jeer lagu soo celiyo.

1. Salaaddii Ciise ee Beertii Gethsemane dhexdeeda (cf. Markos 14:36,39)
2. Ciise lahadalkiisii Butros sarakiciddii kaddib (cf. Yooxanaa 21:17)
3. Salaaddii Bawlos ee “qodaxdii ka gashay jidhka” (cf. II Korintos. 12:8)

Tani waa hab Semitig ahaaneed oo wax lagu xoojinayo sida ku jirta (cf. Ishacyaah. 6:3; Yeremyaah. 7:4). Dhacdadan waxa ay si gooni ah u soo bandhigaysaa Butros ka cago jiididdiisii in aqballo codka samaawiga ah!

A. T. Robertson, *Word Pictures In the New Testament* erey xamaasad leh ayuu u hayaa qodobkan. “Halkan waxaa ah tilmaan ka soo hor jeedda oo aan sabab loo hayn oo ku saabsan qaybta kan codka Ilaah ka aqbalay amarka uu amarka Rabbigu u soo gudbo qofka rabitaanniisa iyo iyo dulqaad la’aantiisa. Waxaa maanta jira tusaalooyin waaweyn oo ay uu shaygan leeyahay. Waa dareen run ah oo ku aaddan in Butros uu ilaalinayey in timaaddo ceeb weyn oo ka fog doonista Rabbiga.” (bogga. 137).

NASB (UPDATED) TEXT: 10:17-23a

¹⁷Haddaba Butros intuu si aad ah ugu wareersaday riyadii uu arkay waxay micneheedu ahayd. bal eega, nimankii Korneeliyos soo diray. iyagoo mar weydiistay gurigii Simoon. ayay waxay istaageen albaabka hortiiisa, ¹⁸waxayna u yeedheen oo weydiisteen in Simoon, kan la yidhaahdo Butros, uu meeshaas marti ku yahay iyo in kale. ¹⁹Oo Butros intuu riyadii ka fikirayay ayaa Ruuxu wuxuu ku yidhi, Bal eeg, saddex nin baa ku raadinaysa. ²⁰Haddaba kac oo hoosta tag oo raac, adoo aan shaki lahayn, maxaa yeelay, anaa soo diray. ²¹Markaasaa Butros nimankii hoos ugu tegey, oo wuxuu ku yidhi, Bal eega, anigu waxaan ahay kaad raadinaysaan. Waa maxay sababta aad u timaadeen? ²²Markaasay waxay ku yidhaahdeen, Korneeliyos oo boqol askari u taliya oo nin xaqa ah, Ilaahna ka cabsada, oo quruunta Yuhuudda oo dhammuna wanaaggiisa u markhaati furto, waxaa u digay iyaga malaa'ig qoduus ah inuu gurigiisa kuugu yeedho, hadallona kaa maqlo. ²³Sidaas aawadeed ayuu gudaha ugu yeedhay oo marti geliyey. Maalintii dambe ayuu kacay oo iyagii la baxay,

10:17 “Butros intuu si aad ah ugu wareersaday” kani waa fal tegay oo socda oo wax caddaynaya sheegaya fal tegay bilowgii.

Dhowr jeer ayuu Butros isticmaalay middan si uu gu muujiyo wareerka xagga maskaxda ah (cf. Luukos 9:7; Fal 2:12; 5:24; 10:17). Butros si toos durbadiiba uma fahmin ujeedka aragtida.

▣ **“riyadii uu arkay”** Ereyga halkan lagu isticmaalay ee *horama* si loo qeexo wixii uu Butros soo maray awgeed ayaa waxa uu la mid yahay sida kii lagu soo isticmaalay aragtidii Korneeliyos ee ku jirtay aayadaha. 3 (cf. aayadda. 19).

10:19 “Ruuxu wuxuu ku yidhi” Xidhiidhka xaqiiqada ah ee ka dhexeeya “Ruuxa ” oo hadlayay sida ku jirta (aayadda. 19) iyo “malaa’igta” hadlaysay sida ku jirta (aayadaha. 3,2) ma kala cadda marka la eego macnaha guud ahaaneed ee ku jira (cf. aayadda. 20, “Aniga qudhayda ayaa soo diray”). Si ahaan, waxaa hadlayay malaa’igta oo ku hadlaysay magaca Ruuxa Qudduuska ah ama labo ayaa lagu caddaynayaa marka la eego sidii Axdigii Hore loo yiqiin Ismuujinta Ilaah. (cf. Baxniintii.3:2,4; Fal 8:26,29).

10:20 Aayaddani aadayey u xoog badan tahay.

1. kac, QAYB YAR oo loo isticmaalay sida AMAR
2. oo hoosta tag, FAL AMAR TAAGAN OO SOCDA
3. raac iyaga, FAL TAAGAN OO HEERKA DHEXE AH OOAMAR AH
4. adoo aan shaki lahayn, QAYB loo isticmaalay AMAR
5. anaa soo diray, *ego* Fal Ebyan oo wax muujinaya

Ma jirin wax arrin oo uu Butros ku baxo! Tani waxa ay ahayd ballan rabbaani ah. Ruuxa ayaa ka masuul ahaa aragtidii Korneeliyos, Korneeliyos diristiisa nimanka, aragtidii Butros, iyo Butros ka jawaabistiisa cidsigooda markan.

10:22 Waxa ay si rumaysad leh ula xidhiidhaan wixii dhacay.

▣

NASB “ xaq ah”
NKJV “nin xaq ah”
NRSV, NJB “saxan”
TEV “nin wanaagsan”

Ereygan waa lagu dhex adeegsaday Axdigii Hore isagoo laga wado “aan eed lahayn.” lama ay xidhiidho dembi la’aansho. (cf. Bilowgii. 6:1; Ayuub 1:1; Luukos 1:6; 2:25) ama xaqnimadii xaqnimadii la bixiyey ee Masiixa (cf. Rooma. 4). Ninkani wuxuu wixii uu fahmay oo dhan u daayey doonista Ilaah. Mawduuc Gaar ah ka eeg: Xaqnimada 3:14.

▣

NASB, NRSV,
NJB “Ilaah ka cabsada”
NKJV “mid Ilaah ka cabsada”
TEV “ku Ilaah caabuda”

Weedhan (ama mid iyadoo kale ah) ayaa la isticmaalayaa in lagu qeexo Korneeliyos idaa ku jirta (cf. 10:2,22,35). Iyo Falimaha Rasuullada 13:16,26,43,50 waxaa loo adeegsanayaa kuwa aan Yuhuudda dhaqanka ahayn ama aan si buuxda Yuhuud looga dhigin, laakiin kuwii sida joogtada ah u tegi jiray sunagogyada. Waxa iyaga loogu yeeri jiray “Ilaah-kacabsadeyaal” (cf. 16:14; 17:4,17; 18:7).

10:23 “Sidaas aawadeed ayuu gudaha ugu yeedhay oo marti geliyey” Kani waa tusaale kale oo ku saabsan sidii uu Butros u sii waday in uu ka soocnaado qaynuunkiisii Yuhuud ahaaneed. Waa hubaal in askariga raacaya uu ahaa Roomaan oo uu weliba Butros ku casumay casho iyo is weheshi. Xusuusnow sida ku jirta aayadda 48 in Butros uu dhowr maalmood joogi doono nin Roomaan ah gurigiisa.

NASB (UPDATED) TEXT: 10:23b-29

^{23b}Maalintii dambe ayuu kacay oo iyagii la baxay, ²⁴Maalintii dambe waxay soo galeen Kaysariya. Korneeliyosna iyaguu sugayay isagoo isugu yeedhay xigtadiisii iyo saaxiibbadiisii u dhowaa. ²⁵Markuu Butros soo galay, ayaa Korneeliyos ka hor yimid, lughiisana ku dhacay, waana caabuday. ²⁶Laakiin Butros baa kiciyey oo ku yidhi, Istaag; aniga qudhayduba nin baan ahay. ²⁷Oo intuu isagii la hadlayay, ayuu soo galay, oo wuxuuna arkay kuwo badan oo isu yimid; ²⁸markaasuu ku yidhi iyagii, Idinka qudhiinnu waa og tihiin inay xaaraan u tahay nin Yahuudi ah inuu ku darmado ama u dhowaado nin quruun kale ah; hase ahaatee Ilaah baa i tusay inaanan ninna ku sheegin nin xaaraan ah ama aan nadiif ahayn; ²⁹sidaas aawadeed, markii la ii yeedhay, waxaan imid diidid la'aan. Saas darteed waxaan idin weydiinayaa sababtii aad iigu soo yeedheen.

10:24 “walaalihii Yaafaa joogana qaarkood ayaa raacay isagii” Cutubyada 11:12 waxa ay sheegayaan in ay lix iyaga ka mid ahu ay jireen. Butros wuu oga in dhacdadani ay dhibaato ka dhex oogayso qaar ka mid ah Yuhuuddii Ciise raacday. Sidaas darteed, wuxuu kaxaystay dhowr marqaati oo raacday isaga (cf. 11:12).

▣ **“Kaysariya”** Kaysariya waxa ay ahayd magaalo qurxoon oo xeebta ku taal. Waxaa si xushmadahaaneed loogu magac daray Kaysar. Waxa ay ahayd xarumihii Falastiiniyiinta ee ay ciidanka Roomaanku soo buuxiyeen. Roomankii ayaa u sameeyay dekad yar.

▣ **“isagoo isugu yeedhay xigtadiisii iyo saaxiibbadiisii u dhowaa”** Korneeliyos, oo sugaya mid hadlayay oo xagga Ilaah ka yimaadda, ayaa u yeeray qoyskiisii ku dhawaa, saaxiibbadiisii, adeegayaashiisii, iyo sida macquulka ah askar kale. Waxaa dhacday in ay saacado badan oo badan ay sugayeen. Alla muxuu Ruux rajol iyo filasho leh buuxiyey gurigaan! Waxan oo dhan waxaa looga wada hadlayay aragtida iyo farriinta. Tan ayaa ah wixii ka argaggixiyey hoggaamiyeyaashii Yuhuudda ee qaybaha kaniisadda u talinayey, in tiro kuwa aan Yuhuudda ahayn ah, oo badankood aan kuwo Ilaah ka cabsada ahayn, lagu soo daray ka buuxintii Ruuxa Qudduuska ah iyo baabtiisid (cf. aayadda. 27).

10:25,27 “Markuu Butros soo galay. . . ayuu soo galay” Waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya qoraallada Giriigga halkan. Hase yeeshee, “soo geliddii” koowaad ee lagu dhex sheegay aayadda. 25 waa albaabkiid derbiga magaalada ee uu gurigu ku yiil, “soo gelidda” labaad ee ku jirta aayadda. 27 waxa ay ahayd soo geliddii guriga Korneeliyos. Mid kasta oo ay dhacdadu ahaataba, Butros waxa uu weli carqalad gelinayaa xeerkaa Yuhuudda isaga oo galaya guri nin aan Yuhuud ahayn.

10:25 “lughiisana ku dhacay, waana caabuday” Tani waa sarbeb caadi ah oo ku jirta Septaugint-ga iyo Injiilka oo ku saabsan caabudaadda. Laakiin, sida macnaha guud la muuqata “xushmad siinta” ayaad mooddaa in fikirku yahay (cf. NJB). Malaa’ig ayaa sii diyaarisay imaanshadii Butros dabcan Korneeliyos wuu xushmayn lahaa oo qaddarin lahaa farriintan (cf. Muujintii. 19:10; 22:8-9).

10:28 “Idinka qudhiinnu waa og tihiin inay xaaraan u tahay nin Yahuudi ah inuu ku darmado ama u dhowaado nin quruun kale ah” Butros waxa uu soo xiganayaa tababbarkiiisii diinta rabbaaniga ama iskuulkii uu ku qaatay sunaogga; hase ahaatee, tan lagama dhex helayo Axdigii Hore dhexdiisa, laakiin waa tafsiiir xaggaa diinta Yuhuudda ah.

▣ **“nin quruun kale ah”** Ereygani waa qoraal kale oo mid la mid ah aanu ku jirin kitaabka halkan Axdiga Cusub oo qudha mooyaane. Ereyo aad naadir u ah ayuu Butros u isticmaalay cutubkan dhexdiisa.

1. *eusebēs*, aaydaha. 2,7, cibaadaysan (cf. II Butros. 2:9)
2. *prospeinos*, aayadda. 10, gaajaysan
3. *dienthumeomai*, aayadda. 19, ka tarjumaysa
4. *sunomileō*, aayadda. 27, la hadlay
5. *athemiton*, aayadda. 28, aan sharci ahayn
6. *alophulō*, aayadda. 28, quruun kale ah

7. *anantirrētos*, aayadda. 29, isagoo aan xitaa wax diidmooyin ah ka celinayn (cf. Fal 19:36)
8. *prosōpolēmpēs*, aayadda. 34, xushmeeyaha dadka (oo la mid ah Rooma. 2:11; Efesos. 6:9; Yacquub 2:19)
9. *katadunasteuē*, aayadda. 38, hoos u cadaadin, ama hoos u riixid (cf. Yacquub 2:6)
10. *procheirotoneō*, aayadda. 41, dooshado ka horraysa

Ma kala cadda in Luukos uu ka soo min guuriyey kulammo kale oo horay u dhacay iyo dhacdooyinka ku jira Falimaha Rasuullada kuwaasoo laga soo qaatay diwaanno iyo ilo kale oo ay hayeen dadkii joogay.

☐ **“hase ahaatee Ilaah baa i tusay inaanan ninna ku sheegin nin xaaraan ah ama aan nadiif ahayn”** Butros farriin buu helay! Xayawaannada ku qoran waraaqda waxa ay u taagnaayeen aadanaha oo dhan kuwaasoo laga sameeyay aragga Ilaah (cf. Bilowgii. 1:26-27). Jacaylka Ilaah u qabo Korneeliyos iyo qoyskiisa iyo saaxiibbadii waxa ay Butros u muujiyey sida adduunka oo dhan uu ugu baahan yahay injiilka! Tani waxa ay adkaynaysaa marqaatifurkii Istefanos iyo wacdigii Filibos.

NASB (UPDATED) TEXT: 10:30-33

³⁰Markaasaa Korneeliyos wuxuu ku yidhi, Afar maalmood oo hore, saacaddan oo kale, ayaan joogay anoo gurigayga saacaddii sagaalaad ku tukanaya; oo bal eeg waxaa i hor istaagay nin qaba dhar dhalaalaya, ³¹oo wuxuu yidhi, Korneeliyosow, baryadaadii waa la maqlay, sadaqooyinkaagiina Ilaah hortiiisa waa laga xusuustay. ³²Sidaas darteed Yaafaa cid u dir oo u yeedho Simoon. kan Butros la yidhaahdo. Wuxuu marti ku yahay guriga Simoon megdeeye oo badda dhinaceeda yaal. ³³Sidaas darteed markiiba cid baan kuu soo diray; oo si wanaagsan baadna u samaysay inaad timid. Haddaba sida darteed dhammaantayo halkan waa wada joognaa Ilaah hortiiisa. inaannu maqalno waxyaalihii Rabbigu kugu amray oo dhan.

10:30 “nin qaba dhar dhalaalaya” Sida qaalibka ah waxa ay malaa’igtu isku muujisaa sidan oo kale (cf. 1:10; Matayos.28:3; Makros 16:5; Yooxanaa 20:12; Luukos 24:4).

10:31 Tani waa markii saddexaad ee cutubkan dhexdiisa lagu caddeeyay wanaagga Korneeliyos (cf. aayadaha. 4,22). Waxa la yaabka lahu ma aha Korneeliyos; ee waa saaxiibbadiisa, adeegayaashiisa, qoyskiisa ee sidoo kale Masiixa rumaystay. Kani waa mid ka mid aha tusaalayaasha ku jira Falimaha Rasuullada ee ku saabsan “badbaadada qoyska.” Dadka maga midka ah ee ku koray waddammada reer Galbeedka ee arkay habka wacdiga halkaa ka socda, waa ay la yaabayaan habkan qoyska dhan ah, laakiin adduunka kale waxa uu leeyahay qabiilooyin, qoysas iyo kooxo isku xidhan. Ilaah waxa uu hayaa hawlo badan oo lagu gaadhayao aadanaha uu araggiisa ka abuuray oo uu awoodaa. Ma jiro qof tusaale u nqon kara hawsha adeegga Rabbiga!

10:33 Dadkani waxa ay diyaar u ahaayeen in ay maqlaan! Waxa ay xaqiiqsadeen in ay ku dhex jireen waqti gaar ah oo ay la leeyihiin farriin-side Ilaah soo diray.

NASB (UPDATED) TEXT: 34-43

³⁴Markaasaa Butros afkiisa kala qaada! oo wuxuu yidhi. Runtii waxaan garanayaa Ilaah inuusan dadka u kala eexan: ³⁵laakiin kii kastoo Ilaah ka cabsada, xaqnimadana sameeya, quruun kastaba ha ku jiree, Ilaah waa aqbalaa. ³⁶Hadalkii ayuu u soo diray reer bini Israa’iil isagoo ku wacdiyaya nabad xagga Ciise Masiix. Isagu waa wax walba Rabbigood. ³⁷Idinka qudhiinnu waad taqaaniin hadalkaas lagu faafiyey Yahuudiya oo dhan oo laga soo bilaabay Galili. baabtiiskii Yooxanaa ku wacdiyey dabadeed. ³⁸ iyo siduu Ilaah Ciisaha reer Naasaret ku subkay Ruuxa Qoduuska ah iyo xoogga. Isagu waa wareegi jiray, wanaagna wuu fali jiray. oo wuxuu bogsiiin jiray kuwii Iblisku caddibay oo dhan: maxaa yeelay. Ilaah baa la jiray isagii. ³⁹Annagu markllaatiyaal baannu ka nahay waxyaalihii oo dhan oo uu ku sameeyey waddanka Yuhuudda iyo Yerusaleem labadaba. Isaguna waa kii ay dileen markay geedkii ka soo deldeleen ⁴⁰Isaga Ilaah baa maalintii saddexaad sara kiciyey. oo bayaan u muujiyey. ⁴¹uma

muujin dadka oo dhan. Laakiin wuxuu u muujiyey markhaatiyaashii Ilaah hore u doortay. xataa amlaga oo isaga wax la cunnay oo la cabnay markuu kuwii dhintay ka soo sara kacay dabadeed.⁴²Wuxuu nagu amray inaannu dadka wacdinno, aannuna markhaati u furno inuu kanu yahay kii Ilaah ka dhigay xaakinka kuwa nool iyo kuwa dhintayba.⁴³Isaga nebiyada oo dhan ayaa u markhaati fura in mid kastoo isaga rumaystaa uu magiciisa ku helo dembidhaafka.

10:34 “Ilaah inuusan dadka u kala eexan” Tani waa bilowgii isu imaadkii Butros eek u socday Korneeliyos. Tusaale wanaagsan ayuu u yahay wacdigii kaniisaddii hore ee ku aaddan kuwa aan Yuhuudda ahayn. Axdigii Hore dhexdiisa weedhan qaabka Yuhuuddu waxa ay muujinaysay dabeecadda Ilaah (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa. 10:17; II Taariikhda. 19:7) iyo sida uu dadkiisa ka doonayo (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa. 1:17; 16:19). Sidoo kale waa dabeecad Ilaah leeyahay oo si guud ahaaneed ugu jirta Axdiga Cusub (cf. Rooma. 2:11; Gal. 2:6; Efesos. 6:9; Kolosay. 3:24-25; I Butros. 1:17). Axdigii Hore dhexdiisaweedhan wxuu macnaheedu si toos u nqonayaa “in wejiga kor loo qaado.” Maxkamadaha Cibraaniga, dadka wax difaacaya madaxa ayey hoos u foorarin jireen si aanan xaakinku u aqoonsan qofka iyo cidda uu u eexanayo. Ilaah ma laha wax dooq ah oo u gaar ah sida (quruumo, jinsi gaar ah, ama shaqsiyaad)! Haddaba, haddii ay tani run tahay sidee ayey doorashada gaarka ahi ku shaqaynaysaa? Ama reer banii Israaiil dad qaar ah u noqonayaan? Ka taxaddara hababka fiqiga casriga ah!

10:35 “kii kastoo Ilaah ka cabsada, xaqnimadana sameeya, quruun kastaba ha ku jiree, Ilaah waa aqbalaa.” Muuqaalkani kuma aaddana ama ma tilmaamayo ujeedkii badbaadada ruux ahaaneed, laakiin ujeedkii qaadhaan-bixinta, salaadda, iyo wanaagga. Mawduuc gaar ah ka eeg: 3:2. Weedhani waa min ay fiqi ahaan la sinnaato fasaxa lagu helayo injiilka (cf. Yooxanaa 1:12; 3:16; Rooma. 10:9-13). Runta ugu weyni waxa ay tahay in oggol yahay oo aqbalyo dadka aan Yuhuudda ahayn iyagoo aan Yuhuudda ku darmin. Tani waxa ay salka fiqiga ee Falimaha Rasuullada 15 ku fadhiisinaysaa ama saldhig uga dhigaysaa Golaha Yerusaaalem.

10:36-39 *The Jerome Biblical Commentary* (majalladda. II, bogga. 188) dhowr fasir oo muhiim ah ayuu ka bixinayaa magacyadan.

1. waxa ay dastuurinayaa Butros soo koobiddiisii injiilka (i.e., *Kerygma*)
2. naxwahooda aya hooseeya, oo wuxuu muujinaya in Luukos uu qoraalladisa horay u haystay oo uusan hindisin ama uusan tafatirin iyaga (qoraalka).

▣ **10:36 “Hadalkii ayuu u soo diray reer bini Israa’iil”** Tani lama xidhiidho Axdigii Hore, laakiin Ciise iyo Rasuulladii wacdigoodii.

▣ **“isagoo ku wacdiyaya nabad xagga Ciise Masiix”** Tani waxa ay si maldahan ugu jirtaa Ishacyaah. 52:7. Ereyga “nabad” saddex waddo ayaa Axdiga Cusub dhexdiisa loogu adeegsaday:

1. nabad ka dhexaysa Ilaah iyo aadanaha (cf. Kolosay. 1:20)
2. nabadda dhinaca ah ee shaqsiyaad rumaystaha (cf. Yooxanaa 14:27; 16:33, Filiboy 4)
3. nabad ka dhexaysa kooxa aqbalay Masiixa (cf. Efesos. 2:14-3:6; Kolosay. 3:16)

Caqabadaha aadanaha oo dhan waxa ay hoos gelayaan Masiixa (cf. Galatiya. 3:28; Kolosay. 3:11)!

▣ **“(Isagu waa wax walba Rabbigood)”** Tani waa sharrax tafatir ah. Tani waa aaladda caalamiga ah ee farriinta iyo ku casumidda injiilka Ciise Masiix oo si xagjirnimo ah uga soo yeeshay afka Yuhuudi xagjir ah (cf. Fal 2:36; Matayos. 28:18; Rooma. 10:12; Efesos. 1:20-22; Kolosay. 2:10; I Butros. 3:22). Waa Ilaah jinsi kasta iyo shay kasta (i.e., Caalamka oo dhan Rabbi u ah)!

10:37,39 “you yourselves know the things which took place” Butros waxa uu adeegsanayaa isla hadalkii wacdigii bentakostiga ee (cf. 2:22,33). Waxa ay maqleen Ciise iyo wixii kula dhacay Yerusaaalem. Mid ayaa la yaabi sidii ay dadkani war bixintan oo dhan ku heleen. Butros ma buunbuunin buu adeegsanayaa? Ma waxaa ku jiray si ahaan dhacdooyin Yerusaaalem ka dhex dhacay? Ma qaar adeegayaashan ka ah ayaa Yuhuud ahaa? Qoraaku aad ayuu u kooban yahay marka ma garan karno.

Qaar ayaa isku imaadkan u adeegsaday in ay ku tilmaamaan:

1. Luukos wacdiyadiisii oo dhan waxaay ku jiraan Falimaha Rasuullada (laakiin Luukos waa qoraa fiican xagga Koine oo aayadaha. 36-38 maaha kuwo wanaagsan, oo Giriig la aqbali karo ah).
2. Luukos waa uu ku saxsanaa ilihiisa uu soo xiganayo isagoo aan sixin naxwihiisa hooseeya.
3. Weedhan waxaa laga waday in aqrisatayaasha dambe ay ka fahmaan Falimaha Rasuullada (cf. *The Jerome Commentary*, majallada. II, bogga. 189).

10:37 “baabtiiskii Yooxanaa ku wacdiyey dabadeed” Sababta Ciise waa la baabtiisay ay had iyo goor rumaystayaasha dan ugu tahay waxaa weeye maaddaama uu Yooxanaa baabtiiskiisu ahaa baabtiis tawbadkeen ah. Ciie uma uusan baahnayn tawbadkeen ama cafis, maaddaama uu dembi la’aan ahaa (cf. II Korintos. 5:21; Cibraaniyada. 4:15; 7:26; I Butros. 2:22; I Yooxanaa 3:5). Aragtiyadu waxa ay ahaayeen:

1. Waxa ay tusaale u ahaayeen rumaystayaashu inay raacaan
2. Waxaay ahayd caddayntiisii ku aaddanayd baahidii rumaystayaasha
3. waxa ay ahayd subkiddiisii iyo u qalabayntiisii adeegga
4. Waxaay calaamad u ahayd hawshiisii madaxfurashada
5. Waxaay ahayd ictiraafiddiisii adeegga iyo iyo farriinta Yooxanaa Baabtiisaha
6. Waxa ay wax-sii-sheegid u ahayd, dhimashadiisii, aasiddiisii, iyo sarakiciddiisii (cf. Rooma. 6:4; Kolosay. 2:12).

Baabtiiskii Yooxanaa waxaa loo arkay in uu ahaa Ciise oo Ruuxu ka buuxsamayo, iyo sidoo kale adeeggii sida la wada arko u dhacay. Saddexda Injiil ee ugu horreeya waxa ay diwaan gelinayaan dhacdadan aan wax lala simo la arag. Markos wuxuu Injiilkiisa ku bilaabayaa (Butros marqaatifurkiisii) ee la xidhiidhay dhacdadan. Tan waxa ay kaniisaddii hore u aragtay in ay tahay bilaabis cusub oo uu Ruuxu leeyahay oo ay la xidhiidho adeegga sida la wada arkayey uu Ciise u qabtay.

10:38 “iyo siduu Ilaah Ciisaha reer Naasaret ku subkay Ruuxa Qodduuska ah iyo xoogga” Ogsoonow shayda ku saabsan Ciise ee uu Butros adkaynayo ama xoojinayo.

1. Ilaah ayaa subkay Isaga (Subkiddu waa ereyga uu Cibraani ahaan asal ahaan yimid ereyga Masiixa)
2. Ruuxa Qodduuska ah (faca cusub waa faca Ruuxa)
3. Awoodda (adeeg waxtar leh)
 - a. wanaag samayn
 - b. bogsiinta kuwa uu jinku cabburiyey (awoodda sharka iyo shayddaanka)
4. Ilaah ayaa la jiray Isaga (wuxuu ka hadlay oo ficil ahaan u muujiyey inuu wakiil ka yahay YHWH)

Sida cad tani waxa ay la xidhiidhaa baabtiiskii Yooxanaa ee Ciise (cf. F. F. Bruce, *Answers to Questions*, bogga. 171-172).

Robert B. Girdlestone, *Synonyms of the Old Testament*, waxa uu hadalka xiisaha leh ka dhigayaa:

“Ereyga Falsameeyahay $\chi\rho\iota\epsilon\upsilon\varsigma$ in shan jeer lagu adeegsaday Axdiga Cusub dhexdiisa. Afar ka mid ah waxa ay la xidhiidhaan ama tilmaamayaan sidii Masiixa Aabbihiis uu u subkay Isaga, magac ahaan: Luukos 4. 18, oo laga soo xiganayo Ishacyaah. 61. 1; Cibraaniyada. 1. 9, oo laga soo xigtay Sabuurrada. 45. 7; Fal 4. 27, oo iyana loo adeegsanayo hab gaar ah xigashada Sabuurka labaad oo si toos u tilmaamaya; iyo Fal 10. 38, oo ku soo sheegnay in Ilaah Ciise ku subkay Ruuxa Qodduuska ah” (bogga. 183). Mawduuc Gaar ah ka eeg: *Kerygma* 2:14.

▣ **“bogsiin jiray kuwii Ibliisku caddibay oo dhan”** Mawduuc Gaar ah ka eeg: 5:3 iyo 5:16.

10:39 “waa kii ay dileen markay geedkii ka soo deldeleen” “Iyagu” waxa ay tilmaamaysaa Yuhuudda hoggaankooda, dadkii badnaa, iyo maamulkii Roomanka. Eeg Sharraxa 2:23. Arrintan ah tiir ka soo laalaadinta waxaa lagu carrabbaabay 5:30 and iyada oo la tilmaan bixinaysa Sharciga Ku Noqoshadiisa. 21:23 (taasoo asal ahaan la xidhiidhay in qofka qodxan madaxa laga saaro si hoos loogu rido ama loo qiimo tiro, laakiin rabbaaniyiintii xilligii Ciise ayaa u tarjumay in ay ahayd sidii ay Roomanku wax u dili jireen), halkaasoo ahayd halkii uu Ciise ku dul daadiyey habaarkii sharcigii Axdigii Hore (cf. Ishacyaah. 53) annaga darteen (cf. Galatiya. 3:13).

10:40 “Isaga Ilaah baa sara kiciyey” Waa wax fiqi ahaan xiiso leh in Ishacyaah.53:4-6,10 lagu sii sheegay in YHWH doonistiisa iyo ujeedkiisa ay ahayd in Ciise uu silco oo dhinto (cf. Bilowgii. 3:15). YHWH wuxuu adeegsaday wakiil ahaan

1. Shayddaan
2. hoggaankii Yuhuudda ee sharka lahaa
3. hoggaankii xukuumaddii Roomanka
4. dadkii badnaa ee Yuhuudda cadhaysan ahaa

Sharku waa uu soo galaa doonista Ilaah! Waa layaan! Wuxuu u adeegsadaa in uu ku so oaf jaro ujeedkiisa ugu dambeeya ee uu u hayo aadanaha uu ka abuuray araggiisa/ekaantiisa. Wow! Alla muxuu fiqi Ilaah ah yahay! Dhimashuu oggolaanayaa, dabadeedna sarakicin ayuu nolol ugu keenayaa dadka oo dhan!

Axdiga Cusub wuxuu aad u xoojinayaa in saddexda shaqsi ee saddexmidnimadu ay ka wada muuqdeen sarakiciddii Ciise:

1. Ruuxa (Rooma. 8:11)
2. Ciise (Yooxanaa 2:19-22; 10:17-18)
3. Aabbaha (Fal 2:24,32; 3:15,25; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30,33,34,37; 27:31; Rooma. 6:4,9)

Tani waxa ay xaqiijin run ah u ahayd Ciise noloshiisii, dhimashadiisii, iyo wax baridyadiisii ku saabsanaa Ilaah. Waxa ay ahayd ujeeddo weyn oo ku jirtay *Kerygma* (i.e., Wacdiyadii sida ku jirta Falimaha Rasuullada, ka eeg Mawduuc Gaar ah: 2:14).

▣ **“maalintii saddexaad”** sababta ku jirta I Korintos. 15:4, qaar waxa ay tixraac ku leeyihiin Sabuurrada. 16:10 ama Hosheeca 6:2, iyo sidoo kale but more probably Yohaaniis 1:17 Sabatuna waa Matayos. 12:40.

10:40-41 “oo bayaan u muujiyey, uma muujin dadka oo dhan” Ciise wuxuu u muuqday dhowr koox oo doornayd (cf. Yooxanaa 14:19, 24; 15:27; 16:16, 22; I Korintos. 15:5-9).

10:41 “xataa amlaga oo isaga wax la cunnay oo la cabnay markuu kuwii dhintay ka soo sara kacay dabadeed” In kastoo Ciise sarakiciddiisii jidh ahaaneed aysan u baahnayn quudin jidh ahaaneed, waxa uu wax ula cabay oo ula cunay in uu u muujiyo marqaatifurkiisa gaarka ah in uu ahaa mid run ah oo uu doonayey in uu u caddeeyo wehelnimada uu la leeyahay iyaga (cf. Luukos 24:35, 41-43; Yooxanaa 21:9-13).

10:42 “He ordered us to preach to the people” magac-u-yaalku waxa uu u taagan yahay Ciise Masiix (cf. Matayos. 28:18-20; Luukos 24:47-48; Yooxanaa 15:27). Marqaati-furkan waxa ay ahayd in laga bilaabo Yreusaalem dabadeedna adduunka oo dhan. (cf 1:8).

▣ **“xaakinka kuwa nool iyo kuwa dhintayba”** Masiixu waxa uu ahaa Aabbaha wakiilkiisa xagga xukunka (cf. Daanyeel. 7:13-14; Yooxanaa 5:22,27; Fal 17:31; II Korintos. 5:10; II Timoteyos. 4:1; I Butros. 4:5) si la mid sidii uu u ahaa Aahhaba wakiilkiisa xagga uunka (cf. Yooxanaa 1:3; Kolosay. 1:16; Cibraaniyada. 1:2). Ciise uma uusan iman in wax xukumo, laakiin in uu badbaadiyo (cf. Yooxanaa 3:17-19). Weedha “kuwa nool iyo kuwa dhintay” waxa ay la xidhiidhaa xukunka dambe, ee Imaanshadiisa Labaad. Rumaystayaasha qaar ayaa iyagoo nool goobjoog ahaan doona (cf. I Tesaloniika. 4:13-18).

MAWDUUC GAAR AH: XUKUMID, XUKUNKA, IYO CADDAAALADDA (5-) SIDA KU JIRTA ISHACYAAH

Waa erey si ballaadhan loogu isticmaalay (BDB 1047) Axdigii Hore dhexdiisa. NIDOTTE, majaladda. 4, bogga. 214, waxa uu qaabaynayaa muhiimaddeeda iyo qaybaheeda.

1. Tawreed, 13%, xaakinnada aadanaha judges
2. Kitaabbada Taarikhda, 34%, hoggaamiyeyaasha aasanaha
3. Qoraallo xikmad ah, 22%, waxqabad Ilaahi ah
4. Nebiyada, 31%, waxqabadyada ugu badan ee Ilaahiga ah

Xusuusnow shaxan soo socda..

YHWH	Masiixa	Israa'iil	Israa'iil
Oo Xaakin ah	oo xaakin ah	xaakinnadoodii sare	xaakinadoodii
2:4	9:7	1:17,21,23	3:2
3:14	11:3,4	26:8	5:7
4:4	16:5	56:1	10:2
5:16	32:1	58:2,8	59:4,9,11,14,15
28:6,17,26	40:14		
30:18	42:1,3,4		
33:5,22	51:4,5		
61:8	53:8		
66:16			

Israa'iil waxa ay ahayd in ay quruumaha u muujiyaan dabeecadda YHWH. Maaddaama ay guuldarraysteen, waxa ay ahayd in uu u soo diro mid faraca reer Israa'iil ka soo jeeda si uu u oofiyo muujintiisa shaqsi ahaaneed oo uu u tuso adduunka (i.e., Masiixa, Ciisaha reer Naasareet, Masiixa, cf. Ishacyaah. 52:11-53:12)!

10:43 “Isaga nebiyada oo dhan ayaa u markhaati fura” Ciise wuxuu u muujiyey labo xerta ka mid ah waddada ku toosan Emaus (tanoo ku jirta oo keliya Luukos 24:13- 35) meeshaas iyo sidii uu Axdigii Hore u tilmaamayey Isaga. Kuwani waxa ay xertii tan ugu muujiyeen qolladdii sare war-bixintan oo noqotay mid marqaatifur u noqotay Yuhuuddii. (cf. 3:18). Ciise maskaxdii xerta ayuu furay (cf. Luukos 24:45).

▣ **“uu magaciisa ku helo”** (cf. Yoo'eel 2:32 and Luukos 24:47)

▣ **“in mid kastoo isaga rumaystaa uu magaciisa ku helo dembidhaafka”** Tani waa farriinta Injiilka:

1. mid kasta
2. uu magaciisa ku helayo
3. kii kasta oo isaga rumaysta
4. uu helayo cafiska dembiga (cf. Luukos 24:46-47)

Waxa diiradda la saarayo waa Ciise, ma aha wax oofin ah oo diiradda la saarayo (i.e., axdiga cusub sida ku jirta Yeremyaah. 31:31-34, cf. Yexesqeel. 36:22-38). Waxa taas loo samaynayo ayaa ah in, mid kasta, si badbaadada loo sameeyo! Ilaah waxa uu doortay in uu la shaqeyo aadanihii dhacay isagoo axdi usoo maraya. Isaga ayaa u bilaabaya oqrshe u dejinaya, laakiin wuxuu sidoo kale amrayaa in aadanaha laga doonayo tawbadkeen, rumaysad, addeecis, iyo dadaal. Aadanaha waxaa qasab ku ah in ay hadiyadda Ilaah ku helaan Ciise Masiix (cf. Yooxanaa 1:12; 3:16; Rooma. 10:9-13). Ma aha mid xawilaad degdeg ah ku imanaysa. Frank Stagg, *New Testament Theology*, waxa ku jira tafsiir xiiso leh oo ku saabsan cafiska iyo xidhiidhkii loogu talo galay ee tawbadkeenka. “Cafisku wuxuu u yeeraa ogaal cusub oo loo yeelanayo dembiga iyo ka soo labasho dib looga soo noqonayo. Hubsashadu waxa ay bixinaysaa in cafiska iyo daahirsanaantu ay si dhab u raacayaan qirashada dembiyada (I Yooxanaa 1:9), laakiin la jirto ballan laga bixiyey meel aan qirasho laga helin ama ayan ka dhicin. Gurigii Korneeliyos dhexdiisa, wixii ka dhacay waxa uu Butros la xidhiidhinayaa cafis rumaysad leh, oo loo cadaynayo in (Ciisahan) uu yahay kii ay nebiyadoo oo dhan ay u sii marqaati fureen; ‘in mid kasta oo magaciisa soo mara ama ku weyddiista uu helayo cafiska dembiga’ (Fal 10:43). Aaminaaddan oo ay tawbadkeen iyo qirasho ayaa ah mid ‘uu ku yeelanayo ama uusan ku yeelanayn’ dembigiisa. Tan macnaheedu ma aha in tawbadkeenku uu ka guulaysanayo cafiska; xitaa tawbadkeenku qofka kama dhigayo in uu mudan yahay cafiska. Sida kuwo kale ay dhigeen, dembiiluhu waa in uu aqbalaa diidmadiisa, oo uu aqbalaa aqbalaadiisa, maaddaama uu og yahay in naf haantiisu yahay mid aan la aqbali karin dembiiluhu ma aha mid la cafin karo illaa ay doonistiisu noqoto in uu *mayada* Ilaah u aqbaloo inuu ku maqlo *haadiisa*” (bogga. 94). In “Isaga lagu rumaysto” ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee: 3:16.

NASB (UPDATED) TEXT: 10:44-48

⁴⁴Intii Butros weli ku hadlayay hadalladaas ayaa Ruuxa Qoduuska ah ku soo degay kuwa hadalka maqlay oo dhan. ⁴⁵Oo kuwii ka mid ahaa kuwii gudnaa oo rumaysta!. iyagoo ahaa intii Butros la timid. way wada yaabeen. maxaa yeelay. xataa dadka aan Yuhuudda ahayn ayaa lagu soo shubay hadiyadda Ruuxa Qoduuska ah. ⁴⁶Waayo. waxay maqleen iyagoo afaf ku hadlaya oo Ilaah weynaynaya. ⁴⁷Markaasaa Butros u jawaabay, oo ku yidhi. Ma nin baa biyaha diidi kara. si aan loogu baabtiisin kuwaas oo ah kuwa Ruuxa Qoduuska ah helay sidaannu annaguna u helnay? ⁴⁸Markaasuu ku amray in lagu baabtiiso magaca Ciise Masiix. Kolkaasay ka baryeen inuu dhawr maalmood la joogo.

10:44 Xusuusnow in Butros uusan weli dhamayn qudbaddiisii markii uu Ruuxa Qudduuska ahu soo degay (cf. 8:16-17; 10:44; 11:15).

☐ **“kuwa hadalka maqlay oo dhan”** Dareenka dhabta ah ee fiqi ahaaneed ee midan ma ahayn Koerneeliyos. Waxaa isaga si buuxda looga oggolaay sunaggoogyada. Waxa ay ahaayeen dhammaan saaxiibbo! Maysan jirin xidhiidh sii horreeyay, oo ay xitaa la lahaayeen sharciga Yuhuudda, haddana markan Ilaah waa uu aqbalay iyaga. Aqbaladdan waxaa lagu caddeeyan oo lagu xaqiijiyey caddayn tan la mid ah oo ah awoodda ruuxa iyo tawbadkeenka Maalintii Bentakostiga.

Sidoo kale ogsoonow in sida dhacdooyinku isugu xigaan is beddelayo. Ruuxu wuxuu yimaaddaa biyaha baabtiiska ka hor, ma aha in uu ku dhiAlso notice that the order of events changes. The Spirit comes before water baptism, ma aha in uu isaga ku xidhan yahay (cf. 2:38) ama uu ka dambeeyo (cf. 8:17). Luukos waxa uu diwaan gelinayaa wixii dhacay, “ma aha wax dhici lahaa” Ka taxaddar isku dayga ah in kulannadan injiil ee ku diwaan gashan Falimaha Rasuullada aad ku xidho kulanka ku jira injiilka!

10:45 Caddayn Ilaah xaggiisa ka timid oo ku saabsan Ruuxa Qudduuska ah sida ku jirta (cf. aayadda. 46) oo dhacday Maalintii Beentakostiga, ayaa mar kale dhacday iyadoo ay dad Roomaan ahi ku jiraan! Calaamaddan gaarka ahi ma aha mid u ahaatay Koerneeliyos iyo saaxiibbadiis oo qudha, laakiin horraantiiba rumaystayaashii gudnaa (cf. aayadda. 47). Waxa ay muujisay hab awood leh oo aan laga murmi karin in Ilaag aqbalay kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. 11:17), xitaa Roomanka! Luukos wuxuu aasaaska qoraalka Falimaha Rasuullada 15, sal uga dhigayaan Golihii Yreusaalem. Butros iyo Bawlos labaduba waxa ay ku qanceen rumaystayaashii Yuhuuddii qurbajoogta ahayd in Ilaah uu si buuxda u aqbalay kuwa aan Yuhuudda ahayn isagoo Ciise u soo marinaya

☐ **“hadiyadda Ruuxa Qoduuska ah”** Adeeggii Ruuxa Quduuska ah waxaa si cad looga dhex arki karaa Yooxanaa 16:8-14. Haddii si kale loo dhaho, qirashada dembigu waa hadiyad Ruuxa Qudduuska ah ka timaadda. Ku noolaanshada xaadirnimadu waa hadiyad katimaadda Ruuxa. Maxaa yeelay kuwani waa ficii cusbaa ee Ruuxa (cf. 2:38; 8:20; 11:17). Waxba si joogto ah oo waxtar leh uma dhacaan Ruuxa Qudduuska ah la’aantiis.

☐ **“ayaa lagu soo shubay”** Kani waa fal tegay oo aan toosnayn oo wax caddaynaya. Ku shubiddu waxa ay ahayd qayb ka mid ah habkii qurbaan bixintii Axdigii Hore. Waa tii lagu sii saadshay sida Ruuxa ku jira Yoo’eel 2:28 Butrosna waxa uu ku soo xigtay qudbaddiisii Beentakostiga (cf. 2:17,33). Ilaah ayaa si buuxda oo joogto ah rumaystayaasha u siiya Ruuxa Qudduuska.

10:47 Tani waa su’aal hal-qabsi ama tusaale ah oo sugaysa jawaabta ah “maya”. This is a rhetorical question which expects a “no” answer. Su’aashu waxa ay ahayd in la helo aqbaladda rumaystayaasha Yuhuudda ah ee Butros la soo raacay Yaafaa. Mawduuc Gaar ah ka eeg: Baatiis 2:38.

10:48 **“Markaasuu ku amray in lagu baabtiiso magaca Ciise Masiix”** Ogsoonow in baabtiisku ahaa mid deg-deg ah. Sidoo kale ogsoonow in lagu sameeyay magaca Ciise sida ku jirta 2:38 iyo 19:5. Habka baabtiiska ee ku jira Falimaha rasuullada mid lagu sameeyay “magaca Ciise,” halka sida ku jirta Matayos. 28:19 lagu sameeyay magaca Ilaaha saddexmidnimada. Qaabku ma aha furaha, laakiin waa qalbiga kuwa dalbanaya!

SU'AALO FALAQAYN AH

Kani waa hage tafsiiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeen kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su'aalahaan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Sababtee ayey badbaadada Korneeliyos muhiimad gaar ah u lahayd?
2. Sidee baa Badbaadadii Korneeliyos loogu waayo arkay si la mid ah sida tii Bawlos?
3. Maxay ahayd muhiimaddii fiqi ahaaneed ee go'a ay xayawaanku ka buuxaan iyo faalladii Butros ay xidhiidh ula leeyihih Korneeliyos?
4. Sababtee ayey Masiixiyobiddii Kornrriyos saaxiibbadii u noqotay mid saa u dhib badata?
5. Tilmaan ka bixi qudbadii ama wacdigii Butros oo babar dhig dhacdooyinka kale ee badbaado ee ku jira Falimaha Rasuullada. Waa ay kala duwan yihiin, welisa waa isku mid.

FALIMAHA RASUULLADA 11

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Warbixintii Butros ee kaniisadda Yerusaaalem	Butros oo difaacaya nimcada Ilaah	Difaacitaankii Butros	Warbixintii Butros ee kaniisadda Yerusaaalem	Yerusaaalem: Butros waxa uu cadaynayaa waxa lagu eedeeyay
11:1-18	11:1-18	11:1-18	11:1-4 11:5-17	11:1-10 11:11-14 11:15-17
Kaniisaddii Antiyokh	Barnabas iyo Sawlos oo jooga Antiyokh	Adeeggii Giriiggii Antiyokh	Kaniisaddii Antiyokh	Asaaskii kaniisaddii Antiyokh
11:19-26	11:19-26	11:19-26	11:19-26	11:19-21 11:22-24 11:25-26
	Daryeelkii Yahuudiya	Gargaar abaareed ayaa loo diray Yerusaaalem		Barnabas iyo Sawlos oo loo diray Yerusaaalem
11:27-30	11:27-30	11:27-30	11:27-30	11:27-30

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

NASB (UPDATED) TEXT: 11:1-18

¹Haddaba rasuulladii iyo walaalihii Yahuudiya joogay ayay waxay maqleen hl dadka aan Yuhuudda ahayna ay hadalkii Ilaah aqbaleen. ²Oo markii Butros Yerusaaalem yimid. kuwii ka mid ahaa kuwii gudnaa ayaa la murmay isagii. ³oo waxay ku yidhaahdeen. Waxaad u tagtay niman aan la gudin, waadna la cuntay. ⁴laakiin Butros wuxuu bilaabay inuu sheekadii ugu sheego siday isugu xigtay. oo wuxuu yidhi. ⁵Anigu waxaan joogay magaalada Yaafaa la yidhaahdo oo waan tukanayay. markaas waxaan khilaawo ku arkay riyo oo ahayd weel soo degaya sida shiraaq weyn oo kale oo afartiisa geesood samada lagaga soo dejinayo; wuuna ii soo dhowaaday, ⁶oo markaan aad u fiiriyey, ayaan ka fikiray oo waxaan arkay xayawaankii afarta lugood lahaa oo dhulka. iyo dugaagta. iyo waxa gurguurta. iyo haadda cirka. ⁷Oo waxaan maqlay cod igu leh, Kac. Butrosow, gowrac oo cun. ⁸laakiin waxaan idhi, Saas yannan noqon, Rabbiyow. maxaa yeelay. wax xaaraan ah oo aan nadiif ahayn. weligay afkayga ma gelin. ⁹laakiin markii labaad cod baa samada ka soo jawaabay oo yidhi, Wixii Ilaah nadiifiyey. xaaraan ha ka dhigin. ¹⁰Taasna waxay dhacday saddex goor, markaasaa dhammaantood mar labaad samada kor loogu bixiyey. ¹¹Oo bal eega, markiiba saddex nin baa istaagtay gurigaannu joognay hortiiisa, kuwaasoo la iiga soo diray Kaysariya. ¹²Ruuxuna wuxuu ii sheegay inaan raaco iyaga. anoo aan shaki lahayn. Oo lixdatan walaalaha ihina way i raaceen; waxaannan galnay ninkii gurigiisii; ¹³markaasuu wuxuu noo sheegay siduu gurigiisa ugu arkay malaa'igta taagan oo ku leh, Yaafaa cid u dir oo uga soo yeedh Simoon kan la yidhaahdo Butros; ¹⁴kaasoo kugula hadli doona hadallo aad ku badbaadi doontid, adiga iyo dadka gurigaaga oo dhammiba. ¹⁵Oo kol kaan bilaabay inaan hadlo ayaa Ruuxa Qoduska ah ku soo degay iyaga siduu bilowgii inoogu soo degay imlagana. ¹⁶Markaasaan xusuustay hadalkii Rabbiga, siduu u yidhi. Runtii Yooxanaa wuxuu dadka ku baabtiisay biyo; laakiin idinka waxaa laydinku baabtiisi doonaa Ruuxa Qoduska ah. ¹⁷Haddaba haddii Ilaah iyaga siiyey isku hadiyaddii, siduu inoo siiyey markii aynu Rabbi Ciise Masiix rumaysannay, anigu kumaan ahaa kaygan Ilaah diidi karaa? ¹⁸Oo markay waxyaalahaas maqleen, ayay dooddii ka aamuseen. Ilaah bayna ammaaneen. oo waxay yidhaahdeen, Haddaba xataa dadka aan Yuhuudda ahayna Ilaah baa siiyey toobadkeen inay nolol helaan.

11:1 Aayaddani waxay sheegaysaa in kaniisaddii Yerusaaalem hoggaankeedu ay ka yaabeen dhacdooyinkan. Way yaabeen oo arrintana may taageerin! Iyagu may fahmin adeegga wayn (cf. Matayos. 28:18-20; Luukos 24:47; Fal 1:8) si loogu soo daro dadka jaahilka ah. isla ereyadani waxay kusoo aroorayaan 8:14 waana marka Samaariyiintu qaadanayaan injiilka.

☐ **“walaalihii”** kani waa magac hore oo ay lahaayeen rumaystayaashii hore taasi oo tusinaysa xidhiidhka qoys ahaaneed ee inaga dhexeeya (cf. 1:15; 6:3; 9:30; 10:23; 11:1,12, 29; 12:17; 14:2; 15:1,3,22,23,32-33,40; 16:2,40; 17:6,10,14; 18:18,27; 21:7, 17; 22:5; 28:14-15). In Masiixi la noqdaa waxay ka dhigantahay in qoyska laga mid noqdo (cf. I Korintos. 12:13; Galatiya. 3:28; Kolosay. 3:11).

☐ **“Yahuudiya joogay”** tani waxa ay tusinaysaa xadaynta juquraafi ahaaneed ee kaniisaddii wakhtigaas. Xitaa sanado badan dabadood kaniisaddu may dhaafin xuduud dhaqameedyadeeda. Ciise waxa uu faray ee ku suga 1:8 lama addeecin! Waxa ay aad uula mid tahay Bilowgii 10-11.

☐ **“dadka aan Yuhuudda ahayna ay hadalkii Ilaah aqbaleen”** waa fal tegay wakhti hore oo wax tusmaynaya. Waxa ay tusinaysaa lagama maarmaanimada aqbalitaanka shakhsi ahaaneed ee farriinta (cf. Yooxanaa 1:12; 3:16; Rooma. 10:9-13 Efesos. 2:8-9).

Ereyada “hadalkii Ilaah” waxa ay la mid tahay “injiilka.” Ballan qaadyada caalamiga ah ee Axdiga Hore waxa ay noqdeen kuwo la oofiyo. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8.

11:2 “Oo markii Butros Yerusaaalem yimid” dhibaatada ka taagan adeegga dadka aan Yuhuudda ahayn kaasi oo soconaya ilaa cutubka 15 waxa uu ahaa dib u daawaynta dhibaatada ka taagan hoggaanka kaniisaddii ugu

horraysay ee Yerusaaalem. Kuwo badan oo ka mid ahaa dadkii rumaysadka yeeshay waxa ilaa hadda ay ahaayeen kuwo dhalashadooda kusii dheggaan (cf. 15:5; 21:18-26).



NASB “kuwii ka mid ahaa kuwii gudnaa”
NKJV “kuwii gudnaa”
NRSV, NJB “rumaystayaashii gudnaa”
TEV “kuwii jeclaa guditaanka kuwa aan Yuhuudda ahayn”
Williams “geesiyaashii gudniinka”

Ereyadan waxa loo adeegsaday macnayaal dhowr ah:

1. sida ku sugan 10:45 waxay sheegaysaa Butros lix Yuhuuda oo la socday
2. halkan waxay ku tilmaamaysaa kaniisaddii Yerusaaalem (cf. 11:18 ama 15:5)
3. sida ku sugan Galatiya waxay sheegaysaa rumaystayaashii ka socday Yerusaaalem (cf. 2:12) iyo Yuhuuddii aan rumaysadka lahayn (cf. 1:7; 2:4; 5:10,12)

Su’aali kama taagna daacadnimada rumaystayaashan ama halka ay taagneeyaan caqli ahaan. Si kastaba ha ahaatee, dabiicadda mitidka ah ee injiilku waxay albaabka u furtay dhammaanba dadkii aan xidhiidhka la lahayn Sharciga Muuse (i.e., Rooma. 3:21-31) farriintan (nimco, camal falid la’aan, oo keenaysa badbaadada) oo kuwo badan oo rumaystayaasha casriga ahi u baahi qabaan inay maqlaan.



NASB “ayaa la murmay”
NKJV “eedeeyay”
NRSV, TEV “dhaleeceeyay”
NJB “kasoo horjeestay”

Waa fal aan dhammays tirnayn oo wax tusinaya. Qaabkan naxwe ahaaneed waxa uu tusin karaa waxyaalo si joogto ah looga samayn jiray wakhti tegay marka uu fal bilaabmo. Fiiro u yeelo kuwan dhaqanka rumaystaan oo la murmay Butros, balse aan la murmin injiilka. Iyagu may arag in middani tahay arrin la xidhiidha injiilka.

11:3 “Waxaad u tagtay niman aan la gudin, waadna la cuntay” waxa cad iyada oo Butros aanu ahayn hoggaamiye aan lala doodin. Naxwe ahaan aayaddani waxa ay noqon kartaa hadal caadi ah ama su’aal (NRSV).

Arrintani is weheshiga wax wada cunista ahi waxa ay aad muhiim ugu ahayd dadka Yuhuudda ah. Waxa laga yaabaa ugu horrayntii inay arrintan ka dambaysay sharciyada cuntada ee Laawiyiintii 11. Dadka Yuhuudda ahi dhacdooyinka bulshada lamay wadaagi jirin Kancaaniyiinta. Wax wada cunistu waxay wakhtigaas Bariga Dhow ka ahayd nooc ka mida axdi is weheshi ah. Ciise ayaa sidan oo kale lagu dacweeyey sida ku xusan Matayos. 9:11; 11:19; Luukos 5:30; 15:2.

Butros waxa uu la dhibaatooday arrintan markii uu waday adeeggiisa (cf. Galatiya. 2:12). Tani waxa ay ahayd arrin xaasaasi u ah rumaystayaashii ugu horreeyay. Sidoo kale waxa adag in dib looga fikiro dhaqamada iyo waxyaalaha shakhsi ahaaneed ee gaarka ah, laakiin injiilku wuxuu inaga dalbanayaa in aan samayno (cf. I Korintos. 12:13; Galatiya. 3:23-29; Kolosay. 3:11). Yuhuuddii iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn ee wakhtigaas waxa hadda bedelay, rumaystayaasha iyo kuwa aan rumaysadka lahayn oo iskasoo horjeeda!

11:4-18 Butros waxa uu dib u xusayaa khibraddii uu kasoo arkay Simon iyo Korneliyos guryohooda (Fal 10) ee u ahaa hoggaamiyayaasha Yuhuudda ee Yerusaaalem. Soo celintani (Guddigii Yerusaaalem 15) uu adeegsanayo Luukos ee ah muhiimadda arrintu leedahay (wacdinta dunida) waxa uu u ahaa nolosha kaniisadda. Tani waxay ahayd arrin fiqi ahaaneed oo lagu qaybsanyahay.

11:4
NASB “siday isugu xigtay”
NKJV “sidii bilowgii ay ahayd”
NRSV “tallaabo tallaabo”
TEV “sheegitaan dhammaystiran”
NJB “faahfaahin tallaabo talaabo”

Ereyga *kathexēs* Luukos oo keliya ayaa ku adeegsaday Axdiga Cusub (cf. Luukos 1:3; 8:1; Fal 3:24; 11:4; 18:23). Waxa ay la xidhiidhaa sharixitaanka wax caqli gala ah ama isku daba xiga. Tani waxa ay ku habboontahay qaabkii baadhitaanka ahaa ee Luukos (cf. Luukos 1:1-4), shakhsiyadda, iyo tabobarka xirfadaysan (dhakhtar).

11:6 “oo markaan aad u fiiriyey” eeg firada 1:10.

11:12

NASB “**anoo aan shaki lahayn**”

NKJV “**waxba ka shakiyaynin**”

NRSV “**wax shakiya aan samaynayn**”

TEV “**ka laabasho la’aan**”

NJB “**laabasho la’aan ah**”

Waxa jira qoraal gacmeedyo Giriigga ah oo arrintan ku kala duwan (falka wakhti xaadirka jooga ee ka ahaaday 10:20 ama fal tegay sida ku sugan MSS P⁷⁴ κ^2 , B). xitaa waxa laga jaray qoraal gacmeedka P⁴⁵, D, iyo daabacadaha Laatiinkii Hore iyo Siiriyaanka kuwo ka mid ah. Culimadu waxay door bideen waxyaalaha simani inay is waafaqaan. Sida badanaa ku sugan kala duwanaansha qoraallada Axdiga Cusub middani waxay tahay waxaan saamayneyn macnaha weedha. UBS⁴ ku waxa uu dhigayaa falka tegay ee uusoo horreeyo mafcuulku isaga oo ku bixinaya “C” kuna tirinaya (go’aan adag).

11:14 “badbaadi doontid” Korneliyos wanaaggiisa iyo soo dhowayntiisu kamay dhigin Masiixi! Isaga iyo goyskiisa iyo saaxiibbadiisuna waxa ay ku badbaadeen rumaysashada Masiixa!

11:15 aayaddani fiqi ahaan waa muhiim iyadoo laga arkayo khibraddii laga dhaxlay Bentakostiga ku sugan Falimaha Rasuullada. Ilaah waxa uu adeegsaday oo Yerusaaalem dadka ku tusay waxyaalo ka baxsan cirqiga, goobaha juquraafi iyo dhaqamada kooxaha (aayadda 17). Khibraddu umay ahayn oo keliya Korneliyos, balse sidoo kale

1. Butros
2. Yuhuuddii rumaysadka lahayd ee la socotay
3. kaniisaddii Yerusaaalem.

11:16 “Markaasaan xusuustay hadalkii Rabbiga” tani waxa ay si maldahan u tilmaamysaa ereyada Ciise ee ku sugan Fal 1:5. Waxa middani ay fiqi ahaan tusinaysaa tusaalihii Rasuulladii fiqigooda:

1. xigashada Ciise
2. adeegsashada tusaalaha Ciise
3. xigashada Axdiga Hore (cf. Matayos. 3:11; Fal 1:5)

Butros waxa uu asaasayaa iyada oo Rabbiga laftiisu uu arkay horumarkan (calaamad).

11:17 “haddii” waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah taasi oo uu qoraagu uga socdo ujeedadiisa suugaan ahaaneed.

▣ **“haddii Ilaah iyaga siiyey isku hadiyaddii”** middani sida aayadda 15, waxa ay sheegaysaa waayo aragnimadii Bentakostiga (cf. 2:1-4; 8:15; 10:46; 15:8). Badbaadadu, sida Ruuxa, waxa weeyi hadiyad ka ahaatay Ilaah xaggiisa (cf. Rooma. 3:24; 5:15-17; 6:23; Efesos. 2:8).

▣ **“markii aynu Rabbi Ciise Masiix rumaysannay”** waa in la helo (cf. 11:1; Yooxanaa 1:12; Efesos. 2:8-9). Fiiri u yeelo sida ay aayadda 17 u sheegayso awoodda Ilaah iyo ka jawaab celinta aadanaha. Waxa jira meeleeeyaal dhora oo ku sugan Axdiga Cusub loona adeegsaday rumaysashada Ciise:

1. *epi* = kor (halkan)
2. *eis* = gudo
3. *en* = dhex
4. *hoti* = hadal ku saabsan Ciise
5. Mafcuulka aan tooska ahayn eenu lasonin meeleeeyuhu.

Kala duwanaanshahani waxay u muuqataa inuu toosinayo inaanu jirin qaab naxwe oo la xidhiidha in “la rumaysto” (*pisteuō*). Badanaa, dhinaca shakhsi ahaaneed waa la xoojiyay (marka laga reebo *hoti*, oo loogala jeedo waxyaalaha uu koobsanayo injiilku ama caqiidooyinka). Ciise waa shakhsi la soo dhaweeyo! Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:40 iyo 3:16.

11:18 “ayay dooddii ka aamuseen. Ilaah bayna ammaaneen” markhaati furista Butros may joojinin hawada oo keliya, laakiin waxay sababtay ammaan! Badanaa hoggaamiyayaashan ugu horreeyay iyo rumaystayaasha waxay ahaayeen kuwo wax la bari karo oo dabacsan. Waxay doonayeen inay dejiyaan fahankooda oo raacaan hoggaaminta Ilaah.

▣ **“xataa dadka aan Yuhuudda ahayna Ilaah baa siiyey toobadkeen inay nolol helaan”** waxa jira aayado badan oo ka mida Axdiga Cusub oo tusinaya awoodda Ilaah oo ah isha towbad keenka iyo nimcada labadaba (cf. Fal 5:31, 8:22; II Timoteyos. 2:25).

Arrinta fiqi ahaaneed ee la xidhiidha ereyadani waxa weeyi “sidee awoodda Ilaah ula xidhiidhaa badbaadada oo ay kasoo horjeeddo ka jawaab celinta aadanuhu?” Miyaa rumaysadka iyo towbad keenka (cf. Markos 1:15; Fal 3:16,19; 20:21) dadku yahay jawaab celin mise waxa weeyi hadiyad ka ahaatay Ilaah? waxa jira aayado si xooggan u tusinaya inay yihiin hadiyad ka ahaatay Ilaah (cf. Fal 5:31; 11:18; Rooma. 2:4; iyo II Timoteyos. 2:25). Maadaama oon rumaysanahay in Qorniinka oo dhami yahay waxyi (cf. II Timoteyos. 3:16) kaddib waa in la is barbar dhigo dhammaanba qoraallada la xidhiidha arrinkasta oo fiqi ahaaneed iyada oon la raacayn caddayn ama mabda’a madaahibta. Waxa cad iyada oo Ilaaha keliya ee runta ahi uu yahay ka maamula wax kasta! Falimaha Rasuuulladuna arrintan in badan ayuu xoojinayaa. Si kastaba ha ahaatee, waxa uu doortay inuu makhluuqaadkiisa kuwa ugu sharafta badan kula xidhiidho axdi. Hadiyo jeer Ilaah isaga ayaa wax bilaaba, oo qorshayaasha dejiya, laakiin aadanuhu waa inay ka jawaab celiyaan oo ku socdaan ka jawaab celinta. Maaha mid ahaan ama su’aal, laakiin waa xidhiidh. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:47. Wax ku saabsan “towbad keenkana” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 2:38.

Michael Magill, ayaa *NT TransLine* (p. 435, #24) waxa uu soo koobitaan fiican ku samaynayaa waxyaalihii ay Yuhuuddii hore ee ku sugnaa Yerusaaalem u malaynayeen inuu dhici doono.

“Rumaystayaasha Yuhuuddu waxay ogaayeen in farriintu ay u ahaatay dunida. Laakiin badbaadadu waxay ahayd inay si ka gaara Yuhuudda ugu timaaddo kuwa aan ahayn Yuhuudda, waxaanay iyaga ku ahayd fikir cusub. Waxay u arkayeen in badbaadada dunida lagu gaadhsiin doono iyadoo sii maraysa diinta Yuhuudda; diintaas Yuhuudduna iyada ooo xukumi doonta dadka oo dhan oo ay noqon doonaan kuwo si gaara nolosha uga hela Ciise; dhaqankaas Israa’iiliyiintuna uu noqon doono dhaqan caalami ah.”

NASB (UPDATED) TEXT: 11:19-26

¹⁹Haddaba kuwii u kala firidhsanaa, dhibaataadii kacday Istefanos aawadiis, waxay u sodcaaleen tan iyo Foynike iyo Qubrus iyo Antiyokh. iyagoo aan hadalka kula hadlin ninna, Yuhuudda oo keliya mooyaane. ²⁰laakiin waxaa jiray qaar iyaga ka mid ah oo ahaa niman reer Qubrus iyo reer Kuranaya ahaa, kuwaasoo, kolkay Antiyokh yimaadeen. xataa Gariigtiina la hadlay. iyagoo ku wacdiyaya Rabbi Ciise. ²¹Gacanta Rabbi guna waa la jirtay iyaga: oo kuwa tiro badan oo rumaystay baa Rabbiga u soo jeestay. ²²Oo warkii iyaga ku saabsanaa baa wuxuu soo gaadhay kiniisaddii Yerusaaalem ku tiil; markaasa Barnabas tan iyo Antiyokh u direen; ²³kaasoo farxay markuu yimid oo arkay nimcada Ilaah; wuxuuna kulligood ku waaniyey inay Rabbiga ku xajistaan niyad qalbiga ka timid, ²⁴maxaa yeelay, nin wanaagsan buu ahaa oo waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qoduuska ah iyo rumaysad; dad badan baana Rabbiga u kordhay. ²⁵Markaasuu Tarsos tegey inuu Sawlos ka doono; ²⁶markuu soo helayna, ayuu Antiyokh keenay. Waxaana dhacday inay sannad dhan kiniisadda la urureen oo ay dad badan wax bareen, oo meeshii ugu horraysay ee xertii loogu yeedhay Masiixiyiin waxay ahayd Antiyokh.

11:19-30 Aayadahani waxay u muuqdaan inay sii koobayaan arrin taariikhi ah fiqigeeda. Waxa ay la xidhiidhaan 8:4.

11:19 “kuwii u kala firidhsanaa, dhibaatadii kacday aawadeed” waxa aan hore u soo aragnay tusaalayaal dhowra oo ku sugan Falimaha Rasuullada kuna saabsan dhibaatadan (cf. 5:17ff; 6:8-15; 8:1-3; 9:1-2). Fahanka Istefanos ee ku saabsan injiilku waxa uu dhammaanba rumaystayaashii Yuhuudda ahaa ee ku noolaa Falastiin ku qasbay inay dib u fiirin ku sameeyaan rumaysadkooda iyo ujeedada injiilka.

▣ **“Antiyokh”** Antiyokh waxay ahayd magaalada saddexaad ee ugu waynayd Boqortooyada Roomaanka waxayna ku xigta Rooma iyo Iskandariya. Waxay ahayd caasimadda Siiriya waxaana ku noolaa Yuhuud tiro badan. Waxa ay caan ku ahayd nolosheeda kuanka ah iyo anshaxdarradii ku saabsanayd xagga jinsiga. Sidoo kale waxay caan ka ahayd dunida. Waxa ay se noqon doontay xarunta ugu muhiimsan ee Masiixiyadda!

▣ **“iyagoo aan hadalka kula hadlin ninna, Yuhuudda oo keliya mooyaane”** tani waxa ay tusinaysaa in kaniisaddii ugu horraysay aanay hubin in wacdinta kuwa aan Yuhuudda ahayni ay haboontahay. Wada sheekaysiyadu waxa ay soo xiganayaan erayada Ciise ee ku sugan Matayos 10:5, halka kuwa wax arkaa ay kasoo xigan dooneen Matayos. 28:18-20 ama Fal 1:8. Arrintan fiqi ahaaneedna waxa dib loogu fiirsan doonaa Fal 15.

11:20 “niman reer Qubrus iyo reer Kuranaya ahaa” kuwani waxay ahaayeen Yuhuuddii rumaystayaasha ahaa ee ku hadli jiray Giriigga sida ku xusan Fal 6-8, iyagoo bilaabay wacdinta caalamiga ah ee injiilka Masiixiyadda ee Yerusaleem dhexdeeda. Barnabas isna sidoo kale waxa uu ka socday goobahan juquraafi ahaaneed.

▣ **“Gariigtiina la hadlay”** ereygani (*Hellēn*) caadi ahaan waxa uu sheegayaa kuwa aan ahayn Yuhuudda (cf. 14:1; 16:1,3; 18:4; 19:10,17; 20:21; 21:28). Si kastaba ha ahaatee, sida ku sugan 17:4 waxa ay sheegaysaa kuwa aan Yuhuudda ahayn ee ku xidhnaa sunagoga (Ilaah ka cabsada), laakiinse aan xubno ka ahayn (qaatay diinta Yuhuudda).

Su’aashu waxa weeyi, “yuu Luukos ku tilmaamayaa in la wacdiyay.”

1. Yuhuuddii ku hadlaysay Giriigga sida ku xusan 6:1 iyo 9:29 (*Hellēnists*)
2. Kuwii aan Yuhuudda ahayn ee ku xidhnaa sunagoga Gentiles (*Hellēn*)
3. Kuwii aan Yuhuudda ahayn oo dhan (cf. TEV, NJB)?

Marka la eego waxa suurto gala in ereyadani ay sheegayaan kuwii ku hadlayay Giriigga; waxa laga yaabaa qaar in ay yihiin Yuhuuddii Qurbo joogga ahayd, kuwa kalana Yihiin kuwii aan Yuhuudda ahayn.

▣ **“iyagoo ku wacdiyaya Rabbi Ciise.”** Waa falka wakhti xaadirka jooga. Farriintoodu may ahayn mid ku saabsan sharciyada Axdiga Hore iyo nidaamyada, laakiinse waxa ay ku saabsanayd Ciisihii reer Naasereet oo ah Masiixa (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:31)!

11:21 “Gacanta Rabbi guna waa la jirtay iyaga: oo kuwa tiro badan oo rumaystay baa Rabbiga u soo jeestay” tani waa soo koobitaan kale oo ku saabsan dhaqdhaqaaqa Ilaah uu ku samaynayo wacdinta. Ugu dambaynta Fal 1:8 waxa ay noqotay mid la dhammays tiro (aayadda 24b).

Waa hadal maldahan oo Axdiga Hore ah isla markaasna ah garashada joogitaanka YHWH iyo awooddiisa uu ku dhammaystirayo ujeedadiisa isagoo adeegsanaya dhaqdhaqaaqa aadanaha (cf. II Samuu’eel. 3:12).

Waxa xiiso leh iyadoo loo fiirsado ereyga “Rabbi” (*Kurios*) oo lagu adeegsaday bilowga aayaddan iyadoo la sheegayo YHWH (cf. LXX Baxniintii. 3:14; II Samuu’eel. 3:12; Ishacyaah. 59:1, eeg Mawduuca Gaarka ah 1:6). Si kastaba ha ahaatee, qaybta kale ee aayadda waxa loo adeegsaday Ciise Masiix. Isku beddelka magacyadani waxa weeyi mid caan ay ku yihiin qorayaasha Axdiga Cusubi iyaga oo sheegaya ilaahnimada Ciise. Fiiro u yeelo halka Bawlos uu kusoo xiganayo sheegista YHWH isaga oo ku dabaqaya Ciise (i.e., Rooma. 10:13; I Korintos. 2:16; Filiboy. 2:10-11).

“gacanta Rabbigu” waxa weeyi erey shabahaad ahaan loogu adeegsaday Axdiga Hore (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:33). YHWH waa ruux abid ah oo wakhti kasta dhex jooga makhluuqaadka. Ma laha jidh bani aadam oo kale. Si kastaba ha ahaatee, siyaabaha keliya ee aadanuhu wax kasta uga hadli karaani waa iyaga oo jidh shakhsi ahaaneed ku tilmaama, waana ereyo dadka u gaar ah. waa in aan xasuusnaano xadka ay leedahay luqada aadanaha leexday ee taagta darani. Waxa ay xukunka ruuxiga ah uuga hadlaysaa shabahaad iyo ku metelaad. Waxa ay sheegaysaa run, laakiin maaha si ay la garan karo. Ilaah aad ayuu uuga wayn yahay kartideenna aan wax ku

sheegi karno. Si run ah ayuu inaga inoola xidhiidhaa, laakiin waa in aan rumaysano in Ilaah uu yahay mid wayn oo sarreeya! Luqada aadanuhu waxna way muujinaysaa xadna way leedahay!

MAWDUUC GAAR AH: GACAN (LAGU SIFEEYAY YEXESQEEL)

Ereyga “gacan” (BDB 388) waxa uu leeyahay adeegsiyo kala duwan.

1. macnaha caadiga (i.e., gacanta dadka)
 - a. calaamadda qofka oo dhan, 3:18; 18:8,17; 33:6,8
 - b. calaamadda taagdarrada aadanaha, 7:17,27; 21:7; 22:14
 - c. calaamadda cadawiyada ajnebiga ah, 7:21; 11:9; 16:39; 21:31; 23:9,28; 28:10; 30:12; 34:27; 38:12; 39:23
 - d. gacanta caadiga ah, 8:11; 12:7; 16:11; 37:17,19,20
 - e. calaamadda hoggaamiyayaasha beenta ah, 13:21,22,23; 34:10
 - f. calaammada umadda, 23:31,37,42,45; 25:14; 27:15; 28:9; 30:10,22,24,25; 31:11; 39:3
2. ku shabihitaanka ilaahnimada
 - a. soo dhowaynta muujinta, 1:3; 3:14,22; 8:1; 33:22; 37:1; 40:1 (2:9 waa shabahaad kale oo ku saabsan gacanta)
 - b. YHWH awooddiisa xukunka, 6:14; 13:9; 14:9,13; 16:27; 20:33; 25:7,13,16; 35:3; 39:21
 - c. YHWH laftiisa (joogitaankiisa shakhsi ahaaneed), 20:22
 - d. YHWH awooddiisa wax badbaadisa, 20:34 (suuraga waxa ah adeegsiga Baxniintii, cf. 3:20; 4:17; 6:1; 7:19; 13:3)
3. shabahaad malag, 1:8; 8:3; 10:7,8,12,21
4. shabahaadda baabi'iinta malaagyada, 9:1-2; 21:11
5. calaamad ama axdi, 17:18; 20:5(labo jeer),6,15,23,28; 36:7; 44:12; 47:14
6. calaamadda farxad, 25:6
7. ku shabihitaanka malag, 40:3,5; 47:3

11:22 “Barnabas” Barnabas waxa uu tusaale muhiim ah ka yahay kitaabka Falimaha Rasuullada (cf. 4:36-37; 9:27). Magaciisa waxa loo adeegsaday macno tusinaya dhiirri geliye, taasi oo ka muuqanaysa aayadda 23. Kaniisaddii Yerusaaalem waxa ay ahayd mid aan ilaa hadda raalli ka ahayn kusoo darista dadka aan Yuhuudda ahayn! Eeg Mawduuca Gaarka ah 4:36.

11:23 waxa xiiso leh in loo fiirsado markii Barnabas uu arkay joogitaanka Ilaah nimcadiisa oo ku timid Ruuxa, in uu dhiirri geliyay dhammaantood si ay rumaysad u sii lahaadaan (14:22). Waxay middani si cad u tusinaysaa baahida loo qabo dhiirri gelinta dadka Ilaah iyadoo ujeedadu tahay dadaal (eeg Mawduuca Gaarka ah 14:22). Yuhuudda iyo kaniisaddu waxa ay aad u danaynayaan waxyaalaha aan dhaqanka ku fiicnayn ee jaahilnimada ah. injiilkuna maaha keliya hadiyadda badbaadada, laakiin waxa uu ku baaqayaa cibaado (cf. Matayos. 5:48; Rooma. 8:28-29; II Korintos. 3:18; Galatiya. 4:19; Efesos. 4:1; I Tesaloniika. 3:13; 4:3; I Butros. 1:15). Ilaah waxa uu rabaa dadka dunidan dhexdeeda kaga tarjumaya dabeecaddiisa. Ujeedada Masiixiyadduna maaha oo keliya gelitaanka jano, laakiinse waa la midnimada Masiixa ee hadda si ay kuwa kale u yeeshaan rumaysadka Masiixa.

11:24 “nin wanaagsan buu ahaa oo waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qoduuska ah iyo rumaysad” tilmaamitaankani waxa uu aad uula mid yahay Yuhuuddii Giriigga ku hadlaysay ee rumaysadka lahaa (toddobadii) sida ku xusan Fal 6:3, 5. Kaniisaddii ugu horraysay waxa ka buuxay rag kuwan oo kale ah! Alla may taasi run ahaato marka la eego maanta dhaqankeenna iyo kaniisaddeena!

11:25 “Markaasuu Tarsos tegey inuu Sawlos ka doono” falka luqada Koine ga ee (aan ahayn LXX) waxa uu tusinayaa Sawlos oon si fudud lagu helaynin. Luukos oo keliya ayaa ereygan ku dhex adeegsanaya Axdiga Cusub (cf. Luukos 2:44,45; Fal 11:25). Sanadahan aamusna waxa lagu sheegay Galatiya 1:21. Wakhtiga uu yahayna waa mid aan la hubin, laakiinse ku dhowaad waxay ahayd toban sano.

11:26 “kaniisad” eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11.

▣ **“ayuu Antiyokh keenay... oo meeshii ugu horraysay ee xertii loogu yeedhay Masiixiyiin waxay ahayd Antiyokh.”** Ugu horrayn “Masiixiyiin” waxa lagu tilmaami jiray rumaystayaasha iyadoo ay ku magacaabi jireen jaahiliintu. Waxa la yaab leh iyada oo ereygani uu dhif ku yahay Axdiga Cusub dhexdiisa. Samaynta ereygu (ku dhamaanaya *ianos*) waxa uu raacayaa tusaalaha kuwa wax raaca ee taageera; Herodos (iyo qoyskiisa) waxa lagu magacaabay “Herodiyiin” (cf. Markos 3:6; 12:13; Matayos. 22:16). Adeegsigeeda wakhtigii Helinistiga waxa uu tusinayaa sida magaca Messayah (Cibraani) xagga Giriigga waxa loogu tarjumay Masiix waxaanu noqday magaca lagu magaacbo kuwa raaca Ciise (Masiixiyiin).

Dhinacan Helenistigga, waxa suurto gal ah in ereyga ay bixiyeen saraakiishii dawladdu iyaga oo ku magacaabay in Yuhuudda lagaga soocay rumaystayaasha.

NASB (UPDATED) TEXT: 11:27-30

²⁷Wakhtigaas waxaa Yerusaaalem ka yimid nebiyo inay Antiyokh tagaan. **28** Markaasaa mid iyaga ka mid ah oo Agabos la odhan jiray ayaa istaagay, oo wuxuu Ruuxa ku sheegay hl abaar weyni dunida ku dhici doonto, taas oo dhacday wakhtigii Kalawdiyos. **29** Markaasaa mid kasta oo xertii ka mid ihiba, sidii tabartiisu ahayd, wuxuu goostay inuu caawimaad u diro walaalihii Yahuudiya jooga. **30** oo sidaasay yeeleen, oo waxay waayeelladii ugu sii dhiibeen gacanta Barnabas iyo Sawlos.

11:27 “nebiyo” Nebiyada marar badan ayaa lagu sheegay Axdiga Cusub (cf. 13:1; 15:32; 21:10; I Korintos. 12:28; 14:1-5, 29-33; Efesos. 2:20; 4:10). Badanaa lama hubo haddii middani ay ku shaqaynaso waxsii sheegis sida halkan oo kale, ama waxsii sheegis sida ku sugan I Korintos 14 iyo Fal 2:17 (cf. 13:6; 15:32; I Korintos. 12:28; 14:1-5, 29-33; Efesos. 2:20; 4:10).

Axdiga Hore dhexdiisa nebiyadu waa afhayeenada Ilaah, iyaga oo sharraxaya muujintiisa; si kastaba ha ahaatee nebiyada Axdiga Cusub maaha kuwo dhexdhexaadiyayaal ka ah muujinta Ilaah. Arrintan muhiimaddeeda waxa lahaa qorayaasha Axdiga Cusub kuwaasoo badankoodu ahaa Rasuullo ama kuwa la xidhiidha Rasuul (Markos, Luukos). Hadiyadda Axdiga Cusub ee nebinimadu waa inay xadidnaato. Muujinta waxyiga ahina way istaagtay (Yuudas 3 iyo 20).

MAWDUUC GAAR AH: WAX SII SHEEGIDDA AXDIGA CUSUB

- I. Ma aha sidii wax sii sheegiddii Axdigii Hore, oo ahaa xidhiidh rabbaani ah oo ah muujinno waxyi oo YHWH ka yimid (cf. Falimaha Rasuullada 3:18,21; Rooma 16:26). Nebiyada oo qura ayey ahayd in ay Qorniinka qoraan
 - A. A.Muuse nebi ayaa lagu magacaabay (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15-21).
 - B. Buugaggii taariikhda (Yashuuca – Boqorrada [Ruut mooyee] waxaa lagu magacaabay “nebiyadii hore” (cf. Falimaha Rasuullada 3:24).
 - C. Nebiyadu waxa ay sidii booka Wadaadka Sare ugu jiran in farriinta ka soo gudbiyaan Ilaah (cf. Ishacyaah – Malaakii).
 - D. D.Aragtida labaad ee Cibraaniyada xeerkoodu waa “nebiyada” (Matayos 5:17; 22:40; Luukos 16:16; 24:23,27; Rooma 3:21).
- II. Axdiga Cusub dhexdiisa aragtida waxaa loo adeegsada dhowr waddoo oo kala duwan.
 - A. Iyadoo lagu tilmaamayo nebiyadii Axdigii Hore iyo farriintoodii waxyiga (cf. Matayos 2:23; 5:12; 11:13; 13:14; Rooma 1:2)
 - B. Iyadoo lagu tilmaamayo farriin ku socota shaqi ama qof beddelkii kooxda wada jirta (nebiyadii Axdigii Hore waxay ugu horraantii la hadleen Israa’iil)
 - C. Iyadoo lagu tilmaamayo Yooxanaa baabtiisaha cf. Matayos 11:9; 14:5; 21:26; Luukos 1:7) iyo Ciise in labadooduba ay yihiin faafiyeyaasha Boqortooyad Ilaah (cf. Matayos 13:57; 21:11,46; Luukos 4:24; 7:16; 13:33; 24:19). Ciise sidoo kale wuu sheegay in uu Nebiyada ka weyn yahay (cf. Matayos 11:9; 12:41; Luukos7:26)
 - D. Nebiyo kale oo Axdiga Cusub ku jira

1. Noloshii Ciise horraanteedii sida ay ugu jirto Injiilka Luukos (i.e., Maryan suxuusaheedii)
 - a. Elisabed (cf. Luukos 1:41-42)
 - b. Sakariyas (Luukos 1:67-79)
 - c. Simecoon (cf. Luukos 2:25-35)
 - d. Anna (cf. Luukos 2:36)
 2. Saadaashii aadka u adkayd (cf. Kayafas 11:51)
 - E. Iyadoo lagu tilmaamayo hal qof uu faafiya injiilka (taxa hadiyadaha faafinta eek u jira I Korintos 12:28-29; Efesos 4:11)
 - F. Iyadoo lagu tilmaamayo hadiyad kaniisadda dhexdeeda ka socota (cf. Matayos 23:34; Falimaha rasuullada 13:1; 15:32; Rooma 12:6; I Korintos 12:10,28-29; 13:2; Efesos 4:11). Mararka qaar tani qof dumar ah ayey timaami kartaa (Luukos 2:36; Falimaha Rasuullada 2:17; 21:9; I Korintos 11:4-5).
 - G. Iyadoo lagu tilmaamayo kittaabka Muujintii (cf. Muujintii 1:3; 22:7,10,18,19)
- III. Nebiyada Axdiga Cusub
- A. Iyagu ma bixiyaan waxyi muujin ah si la mid ah sidii ay nebiyadii Axdigii Hore bixiyeen (i.e., Qorniin). Hadalkani waa macquul marka la eego adeegisa weedha “rumaysadka” (i.e., dareen ah injiil dhammays tiran) ayaa waxaa lagu adeegsaday (cf. Falimaha Rasuullada 6:7; 13:8; 14:22; Galatiya 1:23; 6:10; Filiboy 1:27; Yuudas 3,20.
- Aragtidani waxa ay ku caddahay weedha buuxda ee Yuudas 3, “iimaankii mar la wada siiyey qoduusiinta oo dhan.” “iimaankii mar la wada” waxa ay tilmaamaysaa runta, fiqiga, ujeedooyinka, iyo wax baridda Masiixiyadda ee aragtida adduunka. Qeexiddan ah mar la wada siiyey waxa ay sal u tahay fiqiga baybal ahaneed ee ah in qoraallo waxyi aha ah gebi ahaantood ku joogsadeen Axdiga Cusub, oo aan la oggolaanayn qoraal dambe oo dib laga qoro ama in qoraallo loo aqbalo sidii wax waxyi ama muujin. Waxaa jira meelo badan oo aan la hubin, ama aan caddayn, oo midab dambari ah leh oo ku jira Axdiga Cusub, laakiin kuwa rumaysadka lahu rumaysad ayey ku qaadanayaan in wixii loogaa “baahan yahay” rumaysad iyo waxqabad ahu ay si toos ah ugu jiraan Axdiga Cusub. Habkan isaga ah ee qaadashada waxaa loogu yeeraa “the revelatory triangle.”
1. Ilaah ayaa naf ahaantiisa mar is muujiyey (MUUJIN)
 2. Dad aadane ah ayuu u doortay in ay qoraan oo ay sharraxaan falimihiisa (WAXYI)
 3. Ruuxiisii Qudduuska ahaa ayuu u bixiyey si uu u furo maskaxda iyo qalbiyada aadanaha si ay u fahmaan qoraalladan, ma aha muuqaalkooda, laakiin si ku filan badbaadada iyo nolol Masiixi oo wax tar leh (IFTIIMIN)
- Tilmaanta meeshan ku jirta waxaa weeye in waxygii uu ku joogsada oo uu ku ekaaday Qorniinka. Maba ay jiri karaan qoraallo kale oo wata awood weyn, aragti, iyo muujin. Sharicgani ama qaynuunkani waa la xiray. Waannu haysanna run kasta oo aan u baahannahay in aan Ilaah ugu jawaabno.
- Runtan waxa sida ugu fiican looga dhex arki karo waxaa weeye heshiiskii qoraayaasha baybalka ka dhexeeyay iyo tan kaloo ka soo hor jeedo oo ah heshiisdarrada dadka Ilaah rumaysan ka dhex taagan. Ma jiro qof wax qora ama hadla oo casrigan la joogo keeni kara qoraal sidan isku raacsan sida Qorniinku yahay oo kale.
- B. Waddooyinka qaar nebiyada Axdiga Cusub way kala mid yihiin nebiyadii Axdigii Hore.
1. Saadinta waxyaabaha mustaqbalka (cf. Bawlos, Falimaha Rasuullada 27:22; Agabos, Falimaha Rasuullada 11:27-28; 21:10-11; nebiyo kale oo aan la magacaabin, Falimaha Rasuullada 20:23)
 2. Shaacinta xukunka (cf. Bawlos, Falimaha Rasuullada 13:11; 28:25-28)
 3. Falimaha masaalka ah ee qeexaya dhacdo (cf. Agabus, Falimaha Rasuullada 21:11)
- C. Waxa ay runta injiilka ku shaaciyeen qaabab saadaal ah (cf. Falimaha Rasuullada 11:27-28; 20:23; 21:10-11), laakiin tani ma aha waxa ugu horreeya ee diiradda la saarayo. Wax sii sheegidda ku jirta kitaabka I Korintos waxa ay sal ahaan xidhiidh la leedahay injiilka (cf. 14:24,39).

- D. Waa isla xilligii Ruuxa oo muujinaya xilligii, falimihii dhaqan gelineed ee runta Ilaah oo ku aaddan xaalad ksta, dhaqan kasta, iyo mar ay wax dhacayaan (I Korintos 14:3).
- E. Kuwowax qabad leh ayey ahaayeeh xilligii kaniisadihii Bawlos (cf. I Korintos 11:4-5; 12:28,29; 13:29; 14:1,3,4,5,6,22,24,29,31,32,39,39; Efesos 2:20; 3:5; 4:11; I Tesaloniika 5:20) oo waxaa lagu sheegay Didache-ka dhexdiisa (kaasoo la qoray goor dambe oo qarnigii koowaad ama kii xigay ah, taariikhdu ma cadda) iyo Montanism-ka dhexdiisa oo la qoray qarniyadii labo iyo saddex waqooyinga Afrika dhexdeeda.

IV. Miyaa hadiyadihii Axdiga Cusub la joojiyey?

- A. Aad ayey u adag tahay in su'aashan laga jawaabo. Waxa ay caawimaad ka qaadanaysaa qeexidda ujeeddada hadiyadaha. Ma waxaa macnahoodu yahay in ay xaqiijiyaan bilowga ku wacdinta injiilka mise waa waddooyinka aan joogsi lahayn ama socda oo u ah kaniisaddu in ay nafteeda iyo tan aduunka lumayba ay u adeegto?
- B. Qofku ma wuxuu eegaa taariikha kaniisadda si uu su'aasha uga jawaabo mise Axdiga Cusub naftiisa? Ma jirto caddayn Axdiga Cusub dhexdiisa ku sugnaatay oo ah in hadiyadaha Ruuxu ay ku meel gaadh ahaayeen. Kuwii isku daya in ay adeegsadaan I Korintos 13:8-13 si ay u tilmaamaan arrintan, waxay caayayaan ama u gafayaan ku talo galkii qoraaga, kaasii sheegay in wax kasta ay dhimanayaan jacaylka mooyaane,
- C. Waa la igu jarribayaa in aan idhaahdo, maaddaama uusan Axdiga Cusubi ahayn taarkhda kaniisadda, waa xukunka ama awoodda, rumaystayaashu waa in ay aqoonsadaan in hadiyaduhu ay weli socdaan oo aysan joogsanayn. Arrintu si kastaba ah ahaatee, waxaan filayaa in dhaqanku saameeyay fasiraadda. Qoraallada muuqda qaarkood wax sidaa u sii dheer dhaqan gelin u baahan sida dhaqannada qaar ku jirta. (i.e., dhunkashada qudduuska ah, dumarku in ay is daboolaan, kaniisadaha ku kulankooda guryaha, IWM). Haddii dhaqanku saameeyo waxa qoran, muusan taariikhda kaniisadda u noqon?
- D. tani waxa ay si sahlan ku noqonaysaa in ay tahay su'aal aan si waadax ah looga jawaabi Karin. Rumaystayaasha qaar waxa ay ku doondi lahaayeen "waa joogsadeen" kuwa kalena "waa joogsi la'aan." Marka ay halkan taagan tahay, sida tafsiirro badan ay qabaan, qalbiga rumaystaha ayaa furaha ah. Axdiga Cusub waa aan la qiyaasi karin iyo dhaqan. Culayska meesha ku jira ayaa ah in la lahaado awood lagu go'aansado nooca qoraallada ee dhaqanka ama taariikhdu saameeyeen iyo kan kale ee abadiiga ah(cf. Fee ito Stuart buuggooda la yiraahdo *How to Read the Bible for All its Worth* bogagga 14-19 iyo 69-77). Halkan ayaa ah meesha ay masuuliyadda iyo wada tashigu ka bilaabmayaan, ee laga helayo Rooma 14:1-15:13 iyo I Korintos 8-10, oo waa kuwo muhiim ah. Sidii aan su'aasha uga jawaabi lahayn labo waddo ayey muhiim ku tahay.
 1. Rumayste kasta waa in uu rumaysad ugu socdaa nuurka ay haystaan. Ilaah waxa uu eegtaa qalbiyadeenna iyo ueeddooyinkeenna.
 2. Rumayste kasta waa in uu u oggolaadaa rumaystayaashu in ay fahansanaan ugu dhex socdaan rumaysadkooda. Waa in dulqaad loo yeeshaa isku cufnaanta baybalka. Ilaah waxa uu naga doonayaa in aan is jeclaanno sida uu isaguba u sameeyo.
- E. Si aan u soo gabogabaynno arrintan, Masiixiyaddu waa nolol rumaysad iyo jacayl leh, ma aha fiqiga oo dhammays tiran. Xidhiidh aan la yeelanno isaga oo saamayn u leh ridhiidhkeenna aan kuwa kale la leenahay ayaa aad uga wanaagsan warbxinta muuqata iyo kaamilnaanteeda.

11:28 "abaar weyni dunida ku dhici doonto... Kalawdiyos" cibaaradan juquraafi ahaaneed waxa ay tilmaamaysaa Boqortooyadii Roomaanka (cf. 17:6, 31; 19:27; 24:5). Kalawdiyos waxa uu xukunkiisu ahaa C.D. 41-54. Waxa uu ku xigay Kaligula isagoo ka horreeyay Nero. Waxa jiray xilligiisii abaar ba'an (cf. Suetonius, *Life of Caludius* 18:2). Abaartii ugu xumayd ee Falastiin waxay u dhaxaysay C.D. 44-48, sida uu dhigayo Josephus, *Antiq.* 20.5.2.

11:29 "Markaasaa mid kasta oo xertii ka mid ihiba, sidii tabartiisu ahayd, wuxuu goostay inuu caawimaad u diro" tani waxa weeyi mid ka mida qorshihii u dejisnaa kaniisadihii kuwa aan Yuhuudda ahayn si ay u

socodsiiyaan kaniisadda walaalhood ee Yerusaaalem. Tani waxa ay tusaale u dejisay kaniisadihii Bawlos (cf. 24:17; Rooma. 15:2-28; I Korintos. 16:1-4; II Korintos. 8-9; Galatiya. 2:10).

11:30 “oo waxay waayeelladii ugu sii dhiibeen” tani waa marka ugu horraysa ee la tilmaamo kaniisadda “waayeelladeeda” (cf. 14:23; 15:2,4, 6, 22,23; 16:4; 20:17; 21:18). Ereyga “waayeello” waxa uu la mid yahay ereyada “duqayti,” “wadaaddo sare,” iyo “wadaaddo” (cf. Fal 20:17,28 iyo Tiitos 1:5,7). Ereyga waayeel (*presbuteros*) waxa uu leeyahay asal qabiil oo Axdiga Hore ah, halka ereyga “duqayti” uu ka leeyahay asal xukuumadeed. Dhinaca kale middani waxa ay sheegaysaa koox gaar ah oo hoggaamiyayaal ka ah Yerusaaalem kaniisaddeeda (cf. 15:2,6,22,23). Qaybaha dheeraadka ah ee Yuhuudda Axdiga Cusub, sida Yacquub iyo Cibraaniyada, ilaa hadda waxay adeegsanayaan fahanka Yuhuudda oo la xidhiidha duqayda, hoggaamiyayaasha hoose, laakiin maaha wadaaddo.

▣ **“gacanta Barnabas iyo Sawlos”** waxa jirta falaqayn badan oo ku saabsan sida soo booqashada Yerusaaalem loogu sheegay Galatiya. 2:2,10 iyada oo sheegaysa booqashada Guddiga Yerusaaalem kaasoo lagu sheegay Fal 15. Sidaa darteed waxyar ayaan ka garanaynaa noloshii iyo adeegii Bawlos ee ugu horreeyay.

SU’AALO FALQAYN AH.

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay kuwa aan Yuhuudda ahayni Masiixa ugu aqbalayeen dhibaataada fiqi ahaaneed?
2. Towbad keenku ma hadiyadda Ilaahbaa (aayadda 18) mise dalab axdi ahaaneed (Markos 1:15; Fal 3:16,19; 20:21)?
3. Muxuu Barnabas u tegay isaga oo raadinaya Sawlos (Bawlos)?

FALIMAHA RASUULLADA 12

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Yacquub waa la dilay Butrosna waa la xidhay	Fawdayntii Herodos ee kaniisadda	Silcintii Herodos Agribba	Silcin dheeraad ah	Xidhitaankii Butros iyo siidayntii mucjisada ahayd
12:1-5	12:1-5	12:1-5	12:1-5	12:1-5
Butros oo xabsigii laga samata bixiyay	Butros oo xabsigii laga sii daayay		Butros xabsigii baa laga furay	
12:6-17	12:6-19	12:6-11	12:6-10 12:11	12:6-11
		12:12-17	12:12-15 12:16-17	12:12-17
12:18-19		12:18-19	12:18-19a 12:19b	12:18-19 Dhimashadii silciyaha
Dhimashadii Herodos	Dhimashadii kharribnayd ee Herodos	Dhimashadii Herodos Agribba	Dhimashadii Herodos	
12:20-23	12:20-23	12:20-23	12:20	12:20-23
	Barnabas iyo Sawlos oo la doortay	Barnabas iyo Sawlos oo Qubrus jooga (12:24-13:12)	12:21-23	Barnabas iyo Sawlos oo kusoo laabtay Antiyakh
12:24-25		12:24-25	12:24	12:24
	12:25-13:3		12:25	12:25

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

Abtirsiiinta Herodskii waynaa (warbixin dheeraada ka raadi tasmada qoraalka Flavius Josephus in *Antiquities of the Jews*).

- I. Herodskii waynaa
 - A. Boqorkii Yahuudiya (37-4 C.H.)
 - B. Matayos. 2:1-19; Luukos 1:5
- II. Wiilashiisii
 - A. Herodos Filibos (wiilkii ay dhashay Marianne ina Simoon)
 1. Ninkii qabay Herodiyaas
 2. Turoosi reer Sidoon (4 C.H. - C.D. 34)
 3. Matayos. 14:3; Markos 6:17
 - B. Herodos Filibos (wiilkii ay dhashay Cleopatra)
 1. meeshii Turos ee woqooyiga iyo galbeedka badda Galiili (4 C.H. - C.D. 34)
 2. Luukos 3:1
 - C. Herodos Antipas
 1. Turos Galiili iyo Perea (4 C.H.- C.D. 39)
 2. Khaarajintii Yooxanaa Baabtiisaha
 3. Matayos. 14:1-12; Markos 6:14,29; Luukos 3:19; 9:7-9; 13:31; 23:6-12,15; Falimaha Rasuullada 4:27; 13:1
 - D. Archelaus, Herodskii Ethnarch
 1. Taliyahii Yahuudiya, Samaariya iyo Yahuudiya (4 C.H. - C.D. 6)
 2. Matayos. 2:22
 - E. Aristobulus (wiilkii Mariamne)
 1. Wiilkiisa kaliya waxa uu ahaa Herodos Agrippa I
 2. Taliyahii Falastiin oo dhan (C.D. 41-44)
 3. Dilidii Yacquub iyo xabsi dhigistii Butros
 4. Falimaha Rasuullada 12:1-24; 23:35
 - (a) wiilkiisu wuxuu ahaa Herod Agrippa II, Turos xuduudka dhanka waqooyi (C.D. 50-70)
 - (b) Gabadha uu dhalay waxay ahayd Bernice
 - (1) xaaskii walaalkeed brother
 - (2) Falimaha Rasuullada 25:13-26:32
 - (c) inantiisu waxay ahayd Drusilla
 - (1) xaaskii Felix
 - (2) Falimaha Rasuullada 24:24

BARASHADA EREYEDA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 12:1-5

¹Haddaba wakhtigaas boqorkii Herodos ahaa ayuu wuxuu gacmihiisa u fidiyey inuu dhibo qaar ka mid ah kuwa kiniisadda. ²Wuxuuna seef ku dilay Yacquub oo ahaa Yooxanaa walaalkiis. ³Oo markuu

arkay inay ka farxisay Yuhuuddii. ayuu weliba ku daray inuu soo qabto Butros. Maalmahaasna waxay ahaayeen maalmihii lidda Kibista-aan-khamiirka lahayn. ⁴Oo kolkuu qabtayna, wuxuu ku riday xabsi, oo u dhiibay afar kooxood oo afar askari ah inay ilaaliyaan, isagoo doonaya inuu lidda Kormaridda dabadeed dadka u soo saaro. ⁵Sidaas darteed Butros xabsigaa lagu hayay; laakiin kiniisadda baa Ilaah aad iyo aad ugu bariday isaga.

12:1 “Herodos” Tani waxay ku saabsantahay Herodoskii Agrippa I. waxaa uu xukumayay meela kala duwan oo Falastiin ka mid ah ilaa C.D. 37-44. Waxaa lagu soo barbaarinaya Rooma, waxaanu saaxiib la noqday Gaius, kii raacay boqorkii Tiberius kadibna noqday boqor Caligula. Yahuuddu si diiraan ayay u aqbaleen Herodos hoggaamiyemadiisa maadaama ayaydii hooyo (Mariamne) ahayd Hasmonean/Maccabean (i.e., waddani Yahuudi ah) amiir ah. waxa uu sii adag u raacsanaa diinata Yahuudda (balse ay dhici karto mid ay keento arrimo siyaasadeed). Falaanqayn dhamastiran oo kuu saabsan Herodoskan, eeg Josephus’ *Antiq.* 19.7.3; 19.8.2.

▣ **“kiniisad”** eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11.

▣ **“inuu dhibo”** Herodos waxaa uu midaasi u yeelayay inuu ka farxiyo taageerana kaga helo madaxda Yahuudda (cf. ayaadaha. 3,11). Sidaa si la mid ah ayay sameeyeen madaxdii Roomanka (cf. 24:27; 25:9). Luukos dhawr jeer ayuu adeegsady odhaahdan (cf. 7:6,19; 12:1; 14:2; 18:10). Waxay ahayd odhaah guud oo qoraaladii Septuagint ee dhibida. Luukos eraydiisa waxaa samyn wayn ku yeeshay Septuagintga.

▣ **12:2 “Wuxuuna seef ku dilay Yacquub oo ahaa Yooxanaa walaalki”** Tani waxay ku saabsan tahay Rasuul Yacquub, oo ahaa Yooxanaa walaalkiis (cf. Luukos 5:10; 6:14; 8:51; 9:28,54). Waxaa uu xubin ka ahaa xerta halbowlaha ah (cf. Matayos. 17:1; 26:37; Markos 5:37; 9:2; 14:33; Luukos 9:28). Sababta uu Yacquub u dhintay Butrosna loo daayay waxay ahayd haddaba arrin qasdi dahsoon oo Ilaahiya aha. In seef qoorta looga gooyaa waxay ahayd habka caadiyan ay dadkii reer Rooma loogu fulinjiray ciqaabta dilka, balse sida cad karaahiyo ku ah Yahuudda.

Waa arin xiise leh inaanay xilligan Kaniisaddii hore dareemin baahida loo qabo in la helo badalkii Yacquub sida ay yeeleen Yuudas (cf. 1:15-20). Sabatu macadda, bulse laga yaabee, in ay ahayd Yuudas’ khaayaanadiisii, maaha dhimashadii, aanay keenin baddalkii (cf. 1:15-26).

Qaar ayaa carabka ku adkeeya in Bawlos ugu yeedhay Yacquub walaalki xagga hooye ee Ciise, iyo hoggaamiyahii Kaniisaddii Yerususaalem iyo waliba Rasuul (cf. Galatiya. 1:19) oo ka hadlaysay baddal. Suaashu waxay la xidhiidhaa mawqufka rasmiga ah ee asalka Labo iyo Tobanka aayadood ee tilmaama hadiyada Rasuulnimada (cf. Efesos. 4:11).

Markii aan ka akhiriya James D. G. Dunn, *Unity and Diversity in the New Testament* waxay igu keenatay inaan ka fikiro suurtagalnimada qaab awoodeed ka duwan Kaniisaddii qarnigii koowaad.

1. Rusuushii Yerususaalem
2. halbowlaha xerta (Butros, Yacquub, Yooxanaa) oo Rasuullo
3. Yacquub walaalkii xagga hooye ee Ciise, kaasi oo hoggaamiyay Kaniisaddii Yerususaalem.
4. Toddobadii (Falimaha Rasuullada 6) kuwaasi oo ahaa hoggaamiyeyaashii Yahuuddii af Giriiga ku hadli jirtay.
5. markii danbe diristii Kiniisad Antiyokh ee Suuriya loo diry Bawlos iyo Baarnabaas. tani waxaa lagu dari karaa firqadii Masiixiyada ee raacsanayd, diinta Yahuudda, ee Judaizers, Gnostics, Ebionites. Mid kasta oo kuwani ka mid ahi waxa ay la haayeen hoggaan u gaar ah. midnimada badiyaa Luukos ku waaniyo Masiixiyiinta dhexdooda waxay ahayd mid adag in la sii wado. Wacdigiisii Ciise iyo qoraalka ayaa waxa lafami kari waayo noqonaayay in la ogolaado fasiraado baddan. Tanina waa sababta “xukunka rumaysadka” uu koray qarnigii koowaad. Waxaa jiray heer lagu qiimeeya koox diimeenteeda. Habkan firfircoon oo ruuxu hagay waxa uu xoogga saarayay Axidga Cusub oo loo qaybiyay nidaam habaysan qaabka xaruumaha Kiniisadaha bariga iyo galbeedka. Asalraacnimadu waa qodob ku wayn kuwa facyadaasi laga qaaday asaasahii iyo goobjoogayashii.

12:3 “Qabashdii Butros” tani waxay ka hadkaysaa qabshadii seddexaad (cf. 4:3; 5:18). Masiixiyantu kama reebana silicinta loogu gaysti rumaysadkooda dartii.

▣ **“waxay ahaayeen maalmihii lidda Kibista-aan-khamiirka lahayn”** Tani waxay ka hadlaysaa Iidii Kormarist (cf. aayadda. 4), oo lagu ladhay Iidii Kibista-aan-Khamiirka lahay, oo soconaysay siddeed casho (cf. Baxniintii. 12:18; 23:15; Luukos 22:1). labadaba waxaa lagu xusaa samotabixintii Ilaah reer Bani Iraa’iil ka soo samata bixiyay adoonsigii Masar. Waxaa loo dabaal dagi jiray bisha Nissan 14-21, taasi oo noqon karta bisha Maarso ama Abriil teena, kuna xidhan tirsiga Yahuudda.

12:4 “afar kooxood oo afar askari ah” Tani waxay macnaheedu yahay afar kooxood oo afar askari ah afar jeer maalintiiba, ama, lix iyo toban nin. Tiradani waxay muujinaysaa warwarka uu Herodos ka qabay in uu baxsado Butros (cf. 5:19).

12:5 “kiniisadda baa Ilaah aad iyo aad ugu bariday isaga.

” kiniisaddu way tukanaysay (cf. aayadda. 12), laakiin waxaa ka yaabisay markii Ilaah ka jawaabay! “aad iyo aad” waa naxwe falkaabe ah oo aad u xooggan (cf. Luukos 22:44). Saddex jeer oo kaliya ayaa lagu isticimaalay Axdiga Cusub (cf. I Butros. 1:22).

MAWDUUC GAAR AH: SALAADDA DHEXDHEXAADINTA AH

I. Hordhac

A. Tukashadu waxay ku eg tahay tusaalihii Ciise

1. Salaad gaar ah, Markos 1:35; Luukos 3: 21; 6:12; 9:29; 22:29-46
2. Nadiifinta macbudka, Matayos 21:13; Markos 11:17; Luukos 19:46
3. Tukashada beenta ah Matayos 6:5-13; Luukos 11:2-4

B. Tukashadu waa anngoo si ficil ahaan u muujinayna rumaysadkeenna shaqsi ahaaneed, annagoo daryeelayna Ilaaha jooga doonistiisa, isagoo noo hadli kara una hadli kara kuwa kale tooda.

C. Ilaa hwuxuu si shaqsi ahaaneed u xadeeyay in uu markiiba uga jawaabo baryooyinka carruurtiisa meelo badan (cf. Yacquub 4:2)

D. Ujeedka ugu weyn ee salaaddu waxaa weeyaan in wehelnimo iyo waqti lala qaato Ilaah Qaadirka ah.

E. Waxa tukashada diiradda lagu saarayo waa shay kasta ama mid kasta oo dan u haya rumaystayaasha. Waxaan ka tukan karnaa hal mar , innagoo rumaysan, ama marar badan haddii fakarka ama dantu soo noqnoqto.

F. Salaadda waxaa ku jiri kara arrimo dhowr ah.

1. In la ammaano oo la caabudo Ilaah Qaaddirka ah.
2. In Ilaah looga mahad celiyo xaaridnimadiisa, wehlnimadiisa, iyo adeeggiisa.
3. Qirasho dembiyadeenna ah, kuwii tegay iyo kuwa jooga labadaba
4. In aan ka soo laabanno damacyadeenna iyo rabitaannadeenna
5. In aan qalbi ahaan uga marqaati kacno halka aanu ka qabanayno baahiyada iyo kuwa kale Aabbaha hortiisa

G. Sallaadda aad u tukato qofka aoo kaa maqan waa wax cajiib ah. Ilaah wuu jecel yahay marka aanu kuwa kale u ducayno in ka badan inta aann shaqsi ahaanteenu u ducaysanayno, iyadoo baahiyadu ay weli saamayn ku yeeshaa is beddelka, wax la doonayo in laga jawaabo ama baahi, nafteenno oo qura ma aha laakiin, iyaga.

II. Waxyaabaha Baybal ahaaneed

A. Axdigii Hore

1. Tusaalooyin dhowr ah oo ah u tukashada kuwa kale

- a. Abraham oo u tukanaya Sodom, Bilowgii 18:22ff
- b. Salaadihii Muuse ee reer Bani Israa’iil
 - (1) Baxniintii 5:22-23
 - (2) Baxniintii 32:31ff

- (3) Sharciga ku noqoshadiisa 5:5
- (4) Sharciga ku noqoshadiisa 9:18,25ff
- c. Samuu'eel oo u ducaynaya Reer banii Israa'iil
 - (1) I Samuu'eel 7:5-6,8-9
 - (2) I samuu'eel 12:16-23
 - (3) I Samuu'eel 15:11
- d. Daa'uud oo u duceeyay wiilkiisii, II Samuu'eel 12:16-18
 - 1. Ilaah wuxuu doondoonaayaa kuwa kuwa kale u duceeya, Ishacyaah 59:16
 - 2. Dembiga la og yahay, ee aan la qiran ama maanka tawbadkeen la'aanta aku wuxuu wax yeelleeyaa tukashooyinkeenna.
 - a. Sabuurrada 66:18
 - b. Maahmaahyadii 28:9
 - c. Ishacyaah 59:1-2; 64:7

A. Axdiga Cusub

- 1. Adeegga tukasho ee Wiilka iyo Ruuxa
 - a. Ciise
 - (1) Rooma 8:24
 - (2) Cibraaniyada 7:25
 - (3) I Yooxanaa 2:1
 - b. Ruuxa Qudduuska ah, Rooma 8:26-27
- 2. Adeegii tukashada ee Bawlos
 - a. U tukashadiisii Yuhuudda
 - (1) Rooma 9:1ff
 - (2) Rooma 10:1
 - b. Salaadihiisii Macbudyada
 - (1) Rooma 1:9
 - (2) Efesos 1:16
 - (3) Filiboy 1: 3-4,9
 - (4) Kolosay 1:3,9
 - (5) I Tesaloniika 1:2-3
 - (6) II Tesaloniika 1:11
 - (7) II Timoteyos 1:3
 - (8) Felemon aayadda 4
 - c. Bawlos oo kaniisadaha weyddiistay in ay u soo duceeyaan
 - (1) Rooma 15:30
 - (2) II Korintos 1:11
 - (3) Efesos 6:19
 - (4) Kolosay 4:3
 - (5) I Tesaloniika 5:25
 - (6) II Tesaloniika 3:1
- 3. Adeeggi Kaniisadda ee ducada
 - a. In la isku duceeyo
 - (1) Efesos 6:18
 - (2) I Timoteyos 2:1
 - (3) Yacquub 5:16
 - b. Salaado loo codsaday kooxo gaar ah
 - (1) Cadawyaadeenna, Matayos 5:44
 - (2) Shaqaalaha Masixiyiinta, Cibraaniyada 13:18
 - (3) Hoggaamiyeyaasha, I Timoteyos 2:2
 - (4) Kuwa jirran, Yacquub 5:13-16
 - (5) Back sliders Dembiga xagga dhimashada I Yooxanaa 5:16

c. Salaad dadka oo dhan ah, I Timoteyos 2:1

III. Shuruudaha salaadda laga jawaabo

- A. Xiriirkeenna aannu la leenahay Masiixa iyo Ruuxa
 - 1. In isaga lagu jiro, Yooxanaa 15:7
 - 2. Magaciisa, Yooxanaa 14:13,14; 15:16; 16:23-24
 - 3. IN Ruuxa lagu jiro, Efesos6:18; Yuudas 20
 - 4. Doonista Ilaa hawgeed, Matayos 6:10; I Yooxanaa 3:22; 5:14-15
- B. Ujeeddooyinka
 - 1. IN aadan ku celcelin, Matayos 21:22; Yacquub 1:6-7
 - 2. Is hoosaysiin iyo tawbadkeen, Luukos 18:9-14
 - 3. Si xun u weyddiisasho, Yacquub 4:3
 - 4. Danaystenimo, Yacquub 4:2-3
- C. Arrimo kale
 - 1. Dib u xallin
 - a. Luukos 18:1-8
 - b. Kolosay 4:2
 - c. Yacquub 5:16
 - 2. Wada weyddiisashada
 - a. Matayos7:7-8
 - b. Luukos 11:5-13
 - c. Yacquub 1:5
 - 3. Muranka Gurigaaga, I Butros 3:7
 - 4. Xor ka noqoshada dembiga la og yahay
 - a. Sabuurrada 66:18
 - b. Maahmaahyadii 28:9
 - c. Ishacyaah 59:1-2
 - d. Ishacyaah 64:7

IV. Gabaggabo Tiyooloji ahaaneed

- A. Maxaa muhiimad ah! Maxaa fursad ah! Maxaa waajib iyo masuuliyad ah!
- B. Ciise ayaa ah tusaalaheenna. Ruuxu waa hagaheenna. Aabbuhu si xamaasad leh ayuu inoo sugayaa.
- C. Way beddeli kartaa adiga, qoyskaaga, saaxiibbadaa, iyo adduunkaba.

NASB (UPDATED) TEXT: 12:6-17

⁶Oo markii Herodos damcay inuu soo saaro, isla habeenkaas albaabka hortiisa ayay xabsiga ka ilaalinayeen. 7 Oo bal eega, malaa'igtii Rabbiga Butros wuxuu kala dhex hurday laba askari isagoo ku xidhan laba silsiladood; waardiyaayalna baa is-ag taagtay, oo iftiin baana xabsiga iftiimiyey. Markaasay Butros dhinaca ku dhufatay oo toosisay, oo waxay ku tidhi, Dhaqso u kac. Kolkaasaa silsiladihiina gacmihiisii ka dhaceen. 8 Markaasaa malaa'igtii waxay ku tidhi, Gunto oo kabahaaga xidho. Taas buuna yeelay. Markaasay waxay ku tidhi isagii, Dharkaagii huwo oo i soo raac. 9 Markaasuu soo baxay oo raacay; ma uuna garanaynin in waxay malaa'igtu samaysay ay run tahay, laakiin wuxuu u maleeyey inuu riyo arkay. 10 Oo markay dhaafeen waardiyyihii kowaad iyo kii labaad ayay waxay yimaadeen iriddii birta ahayd oo magaalada loo mari jiray; taas oo iyagii isaga furantay; markaasay ka baxeen oo waxay sii dhex mareen jid yar; markiiba malaa'igtii waa ka tagtay isagii. 11 Oo markii Butros isgartay ayuu wuxuu yidhi, Imminka run ahaantii waan garanayaa in Rabbigu malaa'igtiisii soo diray oo iga bixiyey gacanta Herodos iyo wixii dadka Yuhuuddu filanayeen oo dhan. 12 Kolkoo waxaas ka fikiray, wuxuu yimid gurigii Maryan, oo ahayd hooyadii Yooxanaa oo Markos la odhan jiray; meeshaasoo dad badan ku urursanaayeen oo ku tukanayeen. 13 Markuu albaabka iridda garaacayna, waxaa timid gabadh midiidin ah oo Roda la odhan jiray inay maqasho. 14 Kolkay codkii Butros garatay, farxad darteed bay albaabka u furi weyday, laakiin gudaha bay ku orodday, wayna sheegtay in Butros iridda hor taagan yahay. 15 Markaasay waxay ku yidhaahdeen iyadii, Waad waalan tahay. Laakiin way ku sii adkaysatay inay sidaa tahay. Iyaguse waxay yidhaahdeen, Waa malaa'igtiisii. 16 laakiin Butros waa sii garaacay, oo kolkay albaabka fureenna, way arkeen isagii, wayna yaabeen. 17 laakiin isagoo u gacan haadinaya inay aammusaan ayuu wuxuu u sheegay sida Rabbigu xabsiga uga soo saaray. Wuxuuna ku yidhi, Waxyaalahan u sheega Yacquub iyo walaalahaba. Markaasuu ka tegey oo meel kale aaday.

12:6 “isla habeenkaas” Luukos qoraaladiisu wakhti tilmaame ah. (cf. aayadaha. 3,4,5,6,7,8,10,18).laakiin iska jir inaad u ka bixiso fasis ku salaysan taxanaha taariikhada reer galbeedka . Luukos waxaa uu ujeedkiisu ku salaysanyahay mid caqiido diin faafineed.

▣ **“wuxuu kala dhex hurday laba askari ”** aayadani waxay muujinaysaa sida ayna suuro gal u ahayn inuu baxsado Butros. Waxay aad ugu eegtay sidiiyoo ay rajaynayaan isku day ah in la sii daayo.(cf. 5:19).

12:7 “Oo bal eega, malaa’igtii” waa arrin aan caadi ahayn in malaa’igta Rabbigu awood rabaaani ah ku soo faro galiso. (cf. 5:19; 7:30,35,38,53; 8:26; 10:3,7,22) iyo Ruuxa Qudduuska ah (cf. 8:29,39; 10:19) midan ayaa laysku waydaarsaday buuga Falimaha Rasuullada. Waxaa xiise kale abuuraysa in halkan ku kulmaan awoodaha caadiga ah iyo kuwa Rabbaaniga ah. (si la mid ah masiibadii Baxniinta).

▣ **“Dhaqso u Tani naxwe ahaan waa fal amar ah oo tilmaamaya degdegimo. Maxay Malaai’gtu la degdegaysaa? Miyaani Isagu wax kasta amarkiisa lahayn?**

12:8 “ kabahaaga xidho” kuwani naxwe ahaan waa fal amar ah.

▣ **“Dharkaagii huwo oo i soo raac.”** Tani naxwe ahaan waa fal amar ah oo ay raacday jumlad faleed jooqe ah. maalaa’gtu runahaan si ay hawshan u fuliso way degdegaysanayd! Tani waxay ahayd hal malag oo jahawreersan!

12:9 Butros ma uu hubin in ay tani tahay qaraw , riyo ama mid dhab. (cf. ayaadaha. 11-12; 10:17,19; 11:5).

12:11 “Oo markii Butros isgartay” Luukos waxaa uu adeegsaday jumlad la mid ah tii uu addeegsaday markii uu qeexayay Wiilkii Khaasaarinta badnaa (cf. Luukos 15:17).si lama filaan ah ayay xaqqiiid iyo waaya aragnimadii ay ku maldahnayd ay hortiisa u timid. (cf. aayadda. 12).

12:12 “Guriga Maryan” Maryan waxay ahyd magac guud oo aad loo adeegsado. Dhowr Maryan ayaa lagu sheegay Kitaabka Injiilka..

1. Hoyadii Ciise (cf. Luukos 1:27)
2. Maryan Magdela, xerowad ree Galiile ah (cf. Luukos 8:2; 24:10)
3. Hooyadii Yacquub iyo Yooxanaa(cf. Luukos 24:10)
4. Walaalshii Maarta iyo Laasaroos (cf. Luukos 10:39,42)
5. Afadii Kaloobaas (cf. Yooxanaa 19:25)
6. Hooyadii Yooxanaa Markos (halkan)

▣ **“hooyadii Yooxanaa”** Tani waxay ka hadlaysaa Yooxanaa hooyadii Markos. Kaniisaddii hore waxay ku kulmi jirtay gurigiisa Yerusaaalem ku yiil (cf. Fal 12:12). Goobtaasi oo waliba ahayd meeshii Sayidku kacitaankiisa kor seddexda jeer ka muuqday iyo imaanshahii Ruuxa maalintii Beentakostalk. Yooxanaa- Markos iyo inaaadeerkii Baarnabaas waxay u raaceen Bawlos (cf. Kolosay. 4:10) safarkii kowaad ee diin faafineed (cf. Fal 12:25-13:13). Sababa jira aawadood waa ka goostay kooxda oo waddankiisa u soo laabtay. (cf. Fal 15:38). Barnabas waxaa uu damacsanaa inuu ku daro safarkii labaad, laakiin (cf. Falimaha Rasuullada 15:36-41). Tani ayaa sabab u ahayd kala tagii Bawlos iyo Baarnabaas. Baarnabaasna Yooxanaa Yooxanaa waxaa uu kaxeeyay Qubrus (cf. Fal 15:39). Later kadib, markii uu Bawlos xabsiga ku jiray, wax wanaagsan ayuu ka sheegay Yooxanaa Yooxanaa.(cf. Kolosay. 4:10) sidoo kalena xadhigii labaad ee Bawlos lagu xidhay Rooma wuu soo qaaday Yooxanaa (cf. II Timoteyos. 4:11). Sida muuqata Yooxanaa Yooxanaa waxaa uu ka qayb noqday kooxdii diin faafineed ee uu watay Butros.(cf. I Butros. 5:13). Eusebius’ *Eccl. His.* 3.39.12 ayaa ina siinay arrin xiise badan oo ku saabsan xidhiidhka uu Yooxanaa la lahaa Butros.

“Buugiisa Papias waxaan ka heli karaa tilmaamo hawraaraha Sayidka, Lagana helay Ariston ama si toos ah looga ogaaday presbyter Yooxanaa. Marka haddaba tana lagu soo jeedinayo dareenka aqoonyahanada , waa inaan hddaba raacaa hadalladii aan hore sida kooban u soo xigtay,ee u muuqanayay in uu ahaa qoraaga Injiilka: tani, lafteeda, presbyterku waxuu adeegsaday in yidhaa. ‘Yooxanaa, oo ahaa turjumaankii Butros,oo si taxadarle waxa u qaray, laakiin aan habaysanyn, wax kasta oo uu ka xusuusto hadaladii iyo ficiladii Sayidkaba. Oonu maqal Sayidka mid ka mid xertiisana aan ahayn., laakiin, markkii danbe, sidaan sheegay, , mid ka mid ah kuwii Butros u adeegsady in qoraan waxbaristiisi is Imaatinkii, maadaama aanu si habaysan u samayn hadaladii Sayidka, Yooxanaa qoraaladiisa

waxoogaa ayaa loo cudurdaaray, wuunbuuna qoray wixii uu ka xasuusan karay. Maadama hal ujeed uu lahaa —inaanu ka tagin waxa kasta oo uu maqlay, si qaldana aanu waxuu usoo gudbin” (p. 152).

Xigashadan Papias waxaa ku nisbeeyay “Yooxanaa Odayaasha.” Irenaeus sida uu sheegay “tanina waxaay tahay mid u marfuraysa qoraaladii Papias, dhegaystahii Butros, iyo raacigii Polycarp.” Tani waxay sarbeebaysaa in Papias ka maqlay Yooxaanii Rasuulka ahaa.

▣ **“meeshaasoo dad badan ku urursanaayeen oo ku tukanayeen.”**qaab dhismeedka weedhan naxwe ahaan waxay muujinaysaa in Kiniisadu kulantay oo ku talagaleen inay siiwadaab saalaada (fal tegay oon toos ahayn oo uu raacday jooge dhexgale ahi).

12:13 “albaabka iridda” kani waxa uu ahaa albaab yar oo dariiqa ku jeeda. Alaabaab wayn ayaa jaranjarada ku yaalay.

▣ **“Rooda”** magaceedu waxaa uu ka dhigan yahay “ubax.” Ma cadda in ay u shaqayn jirtay qofka guriga leh amaba ay ka mid ahayd dadkii salaada ka qayb galayay.

12:15 “Waad waalan tahay” kaniisaddu waxaay u tukanaysay in Ilaah si ficila wax u qabto, laakiin aad iyo aad bay ula yaabeen(cf. ayada. 16) markii uu sameeyay.

▣ **“way ku sii adkaysteen”** halkan waxaa ku jira laba jumladood tilmaame oo naxwe ahaan qeexnayn erey, oo ah inn warka Rooda iyo kuwii ku tukanay dabaqa sare ay jawaabahooodu dhaceen dhawr jee.

▣ **“Waa malaa’igtiisii.”**Malaa’igta ayaa door muhiim ah ka qadata qoraalada Luukose. Sida cad Yahuudda ayaa aaminsanaa in qofkasta Malaga qareenka u ahi qaadan karo qaabka qofka uu la socdo(faalaanqay dheeraada oo ku saabsan Yahuudda iyo waxa ay ka rumaysanyiin arrintan malaa’gta qareenka ka ee g, *Encyclopaedia Judaica*, vol. 2, B. 963). Rumaystaanta noocan ahi malaha waxaa raad kitaabi ah. waxaa dhici kartaa in ay tahay mid ka soo farcantay fikirkii *fravashi* ee Zoroastrianism.Qatybo badan oo sheekooyinka hore Rabbaaniyiintu waxay dib ugu laabtaan dhaqnadii hore ee Beershiyiinta oo saamayn wayn ku leh. waxaa jira cadaymo kitaabi oo ku saabsan Malaa’igta Qareenk ah marka la eego rumaystayaasha cusub.(cf. Matayos. 18:10). malaa’igahooda jannada ku jira ayaa wejiga Aabbahayga jannada ku jira (cf. Cibraaniyada. 1:14).

12:17 “laakiin isagoo u gacan haadinaya inay aammusaan” Tani sida cad waa dhacdo muujinaysa goobjoognimo faahfaahsan (cf. 13:16). Tilmaamahan noocani dhowr jeer ayuu Luukos addegsaday (cf. 13:16; 19:33; 21:40).

▣ **“Waxyaalahan u sheega Yacquub iyo walaalahaba”** Tani waxay muujinaysaa in Yacquub, walalaalkii xagga hooyo ee Ciise,uu ahaa hoggaamiyaha Kaniisaddii Yerusaaalem (cf. 15:13-2)

MAWDUUC GAAR AH: YACQUUB, CIISE WALAALKIIS XAGGA HOOYO

- A. waxaa loogu yeedhay “Yacquub kii xaqa ahaa” mar danabana lagu naanaysay“jilbo geele” waayo jilbahiisa ayaa qolofaytay siduu u tukanayay (waxaa laga soo xigtay Hegesippus, waxaana xigtay Eusebius).
- B. Yooxanaa ma ahan rumasyte ilaa laga gaadhay sarakiciddii (cf. Markos 3:21; Yooxanaa 7:5). Ciise si shakhsin ah oo gaara ayuu ugu muuqday isaga (cf. I Korintos. 15:7).
- C. dabaqa sare ayuu xerta la joogay (cf. Falimaha Rasuullad 1:14) suurta galna waxa ah in uu halkaa joogay markii Ruuxu soo degay maalintii Beentakostalka.
- D. xaas ayuu lahaa (cf. I Korintos. 9:5).
- E. Waxaa uu bawlos ku tilmaamay sidii tiir (suurtagalna ay tahay Rasuul, cf. Galatiya. 1:19, laakiin, aan ka mid ahayn labo iyo tobankii (cf. Galatiya. 2:9; Falimaha Rasuullada 12:17; 15:13ff).
- F. *Antiquities ka Yahuudda*, 20.9.1, Josephus waxaa uu sheegayaa in dhagax lagu dilay markay tirsigu ahaa 62 C.D amr ka yimi Sudukiinynta golaha sare ee Sanhedrin la odhan jiray, halka qaar kale (qoraayadii qarnigii labaad, Clementgii reer Alexandria ama Hegesippus) ay ka leeyiin waxaa laga tuuray darbiga Macbudka.
- G. jiilal badan ka dib dhimashadii Ciise qaraabadii Ciise ayaa loo magacaabayay hoggaanka Kiniisada Yerusaaalem.

▣ **“Markaasuu ka tegey oo meel kale aaday.**cidna kama warqabin meesha uu tagay Butros,laakiin ma uu tagin Rooma sida dadka qaar u maleeyaan waayo waxaa uu la joogay golaha Yerusaaalem sida ku qoran Falimaha Rasuullada 15.

Inkastoo Butros Ilaahay awooddisa Rababaaniga ku soo furtay Butros , haddana tani macnaheedu maaha inaan Butros Taxdir samayn ama aanu filan in sidan oo kale markasta is dhacdo. Xasuunoow in Yacquub la dilay! Butros waliba waxaa uu diray hadal kiniisada oo ku xusuusiyay in filan karaan silicin dheeraad rumaysadkooda,furashadiisa awadeed.

NASB (UPDATED) TEXT: 12:18-19

¹⁸Markii waagu beryay. qasmid aan yarayn ayaa askartii ka dhex kacday waxa Butros ku dhacay aawadeed. ¹⁹Oo Herodos markuu raadiyey isagii oo heli waayay, ayuu wuxuu imtixaamay askartii, oo wuxuu ku amray in iyaga la laayo. Markaasuu Yahuudiya ka tegey oo Kaysariya aaday, oo meeshaasuu joogay.

12:18 “qasmid aan yarayn ayaa askartii ka dhex kacday” waa mid xiise leh in Luukos arrimahan u sheegay si diidmo ah, badiyaa muhiimadooda ayuu hoos u dhigayay(cf. 12:18; 15:2; 19:11,23,24; 20:12; 26:19,26; 27:30; 28:2, eeg footnote #8, p. 134, of G. B. Caird, *The Language and Imagery of the Bible*). Qoraal sugaaneedydan sifan leh ee lagu yaqaano liiqada Cimraaniga, ayaa lagu adeegsaday qoraal sugaaneed ka Giriiga. Luukos waxaa si heer sare wax ugu bartay afka Giriiga!

12:19 “wuxuu imtixaamay askartii, oo wuxuu ku amray in iyaga la laayo.” Tani waa tilmaanta macnaha qoraalka (cf. NKJV, NRSV, TEV), laakiin si muuqata ma loo sheegin (cf. NJB). Qaar ka mid fahirada ayaa adeegsado far itaalik ah si ay u aqoonsadaan kalmadaha aan ku jirin qoraalada Giriiga Haddii askari lumiyo maxbuuskii uu ilaalinayay,waa inuu bixiyaa ciqaabtii maxbuuska baxsaday(cf. 16:27; 27:42, Xeerkaa Justinian 9.4.4).

NASB (UPDATED) TEXT: 12:20-23

²⁰Dadka Turos iyo Siidoon ayuu aad uga xumaaday: markaasay u yimaadeen isagii iyagoo isku wada qalbi ah, oo waxay la saaxiibeen Balaastos kii gurigii boqorka u talin jiray, oo nabad bay ka baryeen, maxaa yeelay. waddankooda waxaa cuntada siin jiray waddankii boqorka. ²¹Maalintii la ballamay ayaa Herodos wuxuu gashaday dharkii boqornimada oo carshiga ku fadhiistay, markaasuu iyaga qudbad u jeediyey. ²²Dadkiina waa qayliyeen, oo waxay yidhaahdeen, Kanu waa ilaah codkiis ee ma aha bini-aadan codkiis. ²³Markiiba ayaa malaa’igtii Rabbigu ku dhufatay, maxaa yeelay. Ilaah ma uu ammaanin; markaasaa waxaa cunay dixiryo, oo naftiina ka dhacday.

12:20 “Dadka Turos iyo Siidoon ayuu aad uga xumaaday” Herodos aad buu u xanaaqay sidaasi ayuuna sii ahaa (fal aan dhammaystirnayn). Si gaar ah looma garanayo dhacdo taariikheedan iyo xataa shakhsiga,laakiin gobolka Turos iyo Siidoon waxay ku tiirsanayeen wax soo saarka beerahah ee ka yimaada xagaas iyo Galili (cf. I Boqorradii. 5:11; Cesraa 3:7; iyo waliba suurogal ahaan Yexesqeel. 27:17).

12:21 “Maalintii la ballamay ayaa Herodos wuxuu gashaday dharkii boqornimada” Tani waxay dhacday 44 C.D. warbixin dheeraada oo midani ku saabsan ka eeg qoraaladaJosephus’ *Antiq.* 19.8.2 (ee uu turjumay William Whiston, Kregal).

“xafladdaas oo ahayd mid I, dad badani isgu soo baxeen waxay ahayd mid dadka xukunka haya lagu baranayay,waxayna ahayd mid sharaf u aha gobolkiisa.maalintii labaadna waxaa muuqata inuu soo gashaday dhar gabi ahaanba ka samaysan qalin, qurux badan ka dibna fagaarahii soo istaagay goor hore aroornimo;taasi oo dhalaalka dharkaasi ay falaadhaha cadceedu dhalaal dheeraada u sii yeeshay, oo si layaableh iftiin u bixanay taasi ayaa argagax ku abuurtay ku wii si feejigan u daawanayay isaga: is la mar ahaantaan kuwii isaga u taageersanaa ayaa meel kasta ka yeedhayay iyaga oo buunbuuninaya isaga, (waloow aanay ahayn inuu wanaagsanaa,) laakiin sheegashadiisa inuu yahay ilaahoo ay ku raaceen,—‘Noo naxriiso; inkastoo aynu ilaa iyo

hadda aynu kan kaliya u aragno in uu yahay sidii qof, hadana miayaynu dada wixii ka danbeeya u qansanaa mid awood sare leh noollahan dhimanaaya.’ Tanni boqorku kuma canaan iyaga, mana diid faanintoodii diinta ka baxsanayd. , laakiin markii uu mardanbe kor fiiriyay, wuxuu arkay Guumays ku dul fadhida xadhig dushiisa mara , waxaanu markiiba waxa uu fahmay in ay shimbirtani tahay fariin sidaha warxun, sidii ay mar ugu ahayd fariin sidaha warka wanaagsan; murugo xun ayaana ku dhacdayand. Uurta ayaa dabeedna xanuun kaga siyaaday, waanu sii sakaarayand. Ka dibna waxaa uu fiiriyay saaxiibadii, kuna yidhi,—‘Aniga, ood ugu yeedheen Ilaah, sidaan amray

Haatan waan ka tagaya noloshan; markan runta ay dib u caddaatay haddadan beenta ah ee aad imika igu sheegaysaan. ; aniga, oo aad iigu yeedheen mid aan dhimanayn, waanigaa inyar kaddib dhakhso dhulka hoostiisa laygu aasi doon am immediately to be hurried away by death” (p. 412).

Dareenka Herodo iyo xaalka muuqaalkiisa jidheed waxa waliba lagi tilmaamay mid argagaxsan faahfaahin ka eeg *Antiq.* 17:6:5. The *Jerome Biblical Commentary* (vol. 2, p. 191) ayaa waxaa uu inoo sheegayaa in argagaxa noocaasi ah muujinaya dhimashada Ilaahay ku gafay sidan waxaa qabaa qoraayadii xiliyadii hore.

1. Antiochus IV Epiphanes – II Miikaah. 9:5-18
2. Herod the Great – Josephus, *Antiq.* 17.6.5

12:23 “malaa’igtii Rabbigu” Tani waxay ka hadlaysaa mawlad kulmeedka (cf. Baxniintii. 12:23; II Saamu’eel. 24:16; II Boqorradii. 19:35). Dhimashadu waa mid ku jirta gacmaha Ilaah, mana aha Shaydaanka. Tani waa tusaale xukuna ku meel gaadh ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 12:24

¹²laakiin Rabbiga hadalkiisu waa kordhay oo batay.

12:24 waa tan muhiimada kooban ee hadalku (cf. 6:7; 9:31; 12:24; 16:5; 19:20; 28:31).

NASB (UPDATED) TEXT: 12:25

²⁵Barnabas iyo Sawlos ayaa ka soo noqday Yerusaaalem markay shuqulkoodii soo dhammaysteen, oo waxay wateen Yooxanaa oo la odhan jiray Markos.

12:25 Tani waxay bilw u tahay warbinta safarkii diin faafineed ee Bawlos. Waxaa jira haddab macnayn kala duwan oo laga bixiyo aayadan oo la xidhiidha inaya ka soo laabteen ama “ku” laabteen Yerusaaalem (cf. *eis*, MSS κ and B) or” Jerusalem (cf. *apo*, MS D or *ek*, MSS P74, A). cutubka 13 waxaa uu ku bilaabmaa Barnabaasiyo Sawlos jooga Antiyookh Sa (“ ka Yerusaleem ku Antiyookh,” cf. MS E and Old Latin, Syrian, and Coptic versions).

▣ **“Markos”** eeg fiirada “dadka la xusay,” hordhaca Fal 16.

SU’AALO FALQAYN AH.

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxaa Ilaah u daayay Butrus ee dayn waayay Yacquub?
2. Miyuu kulnakii kiniisaddu la yaabay markii Ilaah ka jawaabay baryadoodii? Sharax nuxurka macnaha.
3. Miyay rumasteyaashu u baahanyin inmalaa’ig hadii Ruuxa Quduusku ku jiro?

FALIMAHA RASUULLADA 13

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Barnabas iyo Sawlos oo la diray 13:1-3	Barnabas iyo Sawlos oo la subkay (12:25-13:3)	Barnabas iyo Sawlos oo jooga Qubrus (12:23-13:12) 13:1-3	Barnabas iyo Sawlos waa la doortay lana diray 13:1-2 13:3	Adeegitaankii oo la diray 13:1-3
Rasuulladii oo Qubrus wax ku wacdiyay 13:4-12	Wacdintii Qubrus dhexdeeda 13:4-12	13:4-12	Qubrus dhexdeeda 13:4-5 13:6-11a 13:11b-12	Qubrus: Saaxirlowgii Barciise 13:4-5 13:6-12
Bawlos iyo Barnabas oo jooga Antiyokhdii Bisidiya 13:13-16a 13:16b-25 13:26-41	Antiyokhdii Bisidiya 13:13-41	U socdaalkii Antiyokhdii Bisidiya 13:13-16a 13:16b-25 13:26-41	Antiyokh dhexdeeda Bisidiya dhexdeeda 13:13-16a 13:16b-20a 13:20b-25 13:26-41	Waxay yimaaddeen Antiyokhdii Bisidiya dhexdeeda 13:13-16a 13:16b-25 13:26-31 13:32-37 13:38-39 13:40-41
13:42-43	Barako iyo khilaaf ka jiray Antiyokh 13:42-52	13:42-43	13:42-43	13:42-43
13:44-52		13:44-47 13:48-52	13:44-47 13:48 13:49-52	Bawlos iyo Barnabas oo wacdiyay kuwa aan Yuhuudda ahayn 13:44-47 13:48-49 13:50-52

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Tani waa warbixintii safarkii diinfaafineed ee markii kowaad u baxeen Bawlas iyo Barnabaas. Inta kale Faliimaha Rasuullad waxay ku saabsantay shaqadii wacdineed ee Bawlas.
- B. waxaa muhiim ah inaad soo rogtu khariirada ku taal baalka danbe ee kitaabkaagan oo raacdo dhulka meelaha lagu sheegay cutubka 13 iyo 14.
- C. waxaa jirta in ay ka muuqato cutubka 13 iyo 14 xaalad kala guura hoggaamintii Barnabaas ilaa tii Bawlas.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 13:1-3

¹Haddaba kiniisaddii Antiyokh ku tiil waxaa joogay nebiyo iyo macallimmo, kuwaas oo ahaa Barnabas, iyo Simecoon oo la odhan jiray Niger, iyo Lukiyos oo reer Kuranaya ah, iyo Mana'een oo la koray taliye Herodos, iyo Sawlos. ²Oo markay Rabbiga caabudayeen oo soomanaayeen ayaa Ruuxa Qoduuska ahu wuxuu ku yidhi, Barnabas iyo Sawlos iigu sooca shuqulkii aan ugu yeedhay. ³Markay soomeen oo duceeyeen oo gacmahoodii saareen dabadeed ayay direen iyagii.

13:1 “Antiyokh” eeg fiirada 11:19.

▣ **“kiniisaddii”** eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11.

▣ **“kiniisaddii”** eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11.

▣ **“nebiyo iyo macallimmo”** Tlabadan hadiyadood ee Ruuxa ayaa ku xusan I Korintos. 12:28 iyo Efesos. 4:11. Marka la eego qaab dhismeedka naxwe ahaan ma cadda in shanta nin ee la xusay ay wada nebiyo iyo macaliiminba ahaayeen ama in seddexda hore nebiyo ahaayeen labada dambena macalimiin.

Dhibaataada eray cilmiyeedkan waxay tahay, “sida hadiyada waxa sii sheegista Axdiga Cusub ula xidhiidho nebiyada Axdiga Hore ?” axdiga hore nebiyo waxaa loo yaqaanaa kuwa kitaabo ku soo degaan. Axdiga Cusub hawshan la siiyay labo iyo toboankii rasuul hore iyo gacanyarayaashooda. Sida uu muujiyo eraycilmiyeedka

“Rasuul” waa dib u hananasho hadiyado soconya (cf. Efesos. 4:11), laakiin isbedelka ku dhacay dhimashadii lab iyo tobanka dib, saasi oo kale ayaa ta nibiguna. Waxyigii ayaa istaagay; kuma jirto waxiy kale oo dheeraadi qoraalka. shaqada nebiyada Axdiga Cusubi waxay tahay in ay Injiilka shaaciya, walibana intaa u dheer shaqo ka duwan, inay ku dadaalaan in ay runta Axdiga Cusub waafajiyaan arrimaha iyo baahiyaha wakhti xadirkan . eeg Mawduuca Gaarka ah 11:27.

Hadiyada macalinimo ee lagu sheegay Fal 13:1 oo lagu daray wax sii sheegis in acombination, balse haddana Efesos. 4:11 waxay la xidhiidha wadaadada. II Timoteyos. 1:11 Bawlos waxaa uu sheegay in uu yahay wacdiye, rasuul, iyo macallin. Halkan waxaad moodaa in ay iskeed u taagantahay, sida ay ugu taala Rooma. 12:7. Waxaa kale oo si gaara u falaanqaynaysaa 3:1ff. Tani waxay sarbeebaysaa in hadiyad hoggaamineed noocan ahi ay rumayste yaal kala duwan si yaalo kala duwan heli karaan si ay u daboolaan baahida kiniisada maanta. Hoggaamiye kasta oo haddiyadiisa gaarka kiniisada ugu adeegaa (cf. Efesos. 4:11) oo uu ugu faafiyaa injiilka, habab kala duwan(nidaamin, wacdin, wax baris).

MAWDUUC GAAR AH: WAXYIGA

Ka“ kaliyo ee kuli ” rumaysad wuxuu ka dhiganyahay run, caqiido, fikrado ,aragtida caalamiga waxa barista Masiixiyada(cf. II Butrus 2:21). Tani waxay mar ina siinaysaa muhiimada salka u ah kitaabka xadaynta waxyiga diimeed ee qoraalada Axdiga Cusub oo ee aan oggolayn in wixii danabe amaba qoraalo loo arko qaar Muujin ah. waxaa jira waxyaalo badan madmadow ku jiro , aan la hubin, iyo meelaha laga shakiyi karo Axdiga Cusub, laakiin rumaystayaasha waxa xaq lagaga dhigay rumaysad wax kasta oo “looga baahanyahay” rumaysadka iyo ku camal falkiis waxa ka qayb ah waadix ahaan shaha axdiga cusubor.

Fikrada noocan waxay ka timiwxaa loo yaqaan “Muujinta seddex xaggalka”

1. Ilaah laftiisu waxaa uu is muujiyay taariikho kala duwan (MUUJIN)
2. waxaa uu doortay qoraayo khaas ah oo buni aadan si ay u qoraan una sharaxaan ficiladiisa (WAXYI)
3. waxaa uu siiyay Ruuxiisa si ay u furto qalbiyada iyo maananka dadka si ay fahmaan qoraaladaas, si aan ilaa heer waadix ahany , laakiin ugu filan badbaado iyo nolol Masiixinimo habboon but adequately for salvation and an effective Christian life (IFTIIN)

Muuhimada ay tani leedaya waa in waxyiga ku xaadaysanayahay qoraayada qoraalka. Ma jiraan qoraalo, ilhaamin, iyo muujino kale oo hufan. Sharcigaasi waa xidhmay. Waxaan haysanaa gabi ahaan runtii aan u baahnay in si wanaagsan ugaga jawaabno uguna raaligalino Ilaah.

Ru ntan waxaa si fiican looga arki karaa is waafaqida qoraayadii kitaabiga ahaa ee aayadahoodu iskaga mid yihiin, diidmada rumayste yaasha ilaahyada beenta ah. qoraa iyo wacdiyaan ma haysto awwoda Rabbaaniga ah ee hoggaamiyenimo ee ay lahaayeen qoraayadii Qorniinku.

MAWDUUC GAAR AH: FAAHFAAHINTA

Ilaah waxa uu u shaqeeyay isagoo raba inuu isu muujiyo aadanaha, fiqi ahaana waxa lagu magacaabay waxyi. Waxa uu niman gaar ah u doortay inay diiwaan geliyaan oo sharraxaan waxyigiisa. Xagga fiqi ahaana waxa lagu magacabaay ilhaamin. Waxa uu Ruuxiisa u soo diray inuu akhristayaasha ka caawiyo fahanka eraygiisa. Fiqi ahaana middan waxa lagu magacaabay faahfaahin. Haddaba, dhibaatadu waxa ay imanaysaa marka aan nidhaahno Ruuxa ayaa ka qayb qaadanaya fahankeenna erayga Ilaah – haddaba maxay yihiin fasiraadahan badani?

Dhibaataada waxa ka qayb ah oo ka been sheegaya fahanka hore ee akhristaha amaba khibradaha shakhsi ahaaneed. Waxa marwalba dhacda in ujeedooyinka shaqsi ahaaneed lasoo jeediyo iyadoo kitaabka daliil ahaan loo adeegsanayo. Waxa dhacda in sidoo kale mararka qaarna kitaabka loo adeegsado dhinacyo gaar ah iyadoo loo adeegsanayo siyaabo kala duwan. Haddaba, faahfaahinta lama mid noqon karto ilhaaminta ama waxyiga Ruuxa Quduuska ah.

Qaabka ugu wanaagsani waxa weeyi iyada oo la sheego fikirka guud ee sadarku uu ka hadlyo, mana aha in qoraal kasta si faahfaahsan loo fasiro. Mawduucyada ayaana badanaa tusinaya qoraaga asalka ah ujeedadiisa. Kormarista cutubyada ayaa iyaduna waxay gacan ka gaysan karta fahanka ujeedada asalka ah ee qoraaga. Mufasiriintu maaha kuwo la ilhaamiyay dibna uma soo saari karno qoraaga nidaamkiisa fasiraadda. Waxa aan isku dayi karnaa inaan fahano waxyaalihii maalmohooda la odhan jiray ee lagu wada xidhiidhi jiray. Waxa jira qaybo ka mida kitaabka oo qarsoon ilaa wakhti. Sidoo kalena waxa jira inaanay qoraalladu waxyaalaha qaar isku waafaqayn, Laakiin waa inaan qaadano xaqiiqada dhexda ah inagoo u ogolaanayna mufasiriintu inay ku socdaan fahanka qoraaga asalka ah. Mufasiriintu waa inay ku socdaan iftiinka ay haystaan iyaga oo marwalba u furan kitaabka iyo Ruuxa. Ilaahna waxa uu inagu xukumi doonnaa heerka fahankeenna ivo sida aan fahankaas ugu noolaanno.

▣ **“Simecoon oo la odhan jiray Niger”** kelmada *niger waa* Laatin kana dhigan madow. Mufasiriinta qaar waxay isku dayaan in ay la xidhiidhiyaan Simecoonkan Markos 15:21.

▣ **“Lukiyos oo reer Kuranaya ah”** waxaa suurta gal ah in kani ahaa mid ka mid Yuhuudii Hellenistic ee ku wacidiyay dadka aan Yuhuuda ahayn Antiyoookh (cf. 11:20). Dabcan maah Lukiyoska lagu sheegay Rooma. 16:21.

▣ **“Mana'een oo la koray taliye Herodos”** *Maana'een* is waa hab Giriiga ah oo Cibraaniga ah *Maanaheem*, kaas oo ka dhigan which means “qalbiqaboojiye.” Ninkani waxa uu noqon karaa mid walaal uu korsaday (Qoraalada Giriigta) Herodoskii Antipas (eeg hordhac cutubka 12) ama uu wuu la koray isaga (Koine papyri). Luukos inta badan waxaa uu ka helayay warbixinta ku saabsan Herodoskii Antibiyas (Tetrarch kii) la sheekaysigiis ninkan.

13:2

NASB “adeegaya”

NKJV “adeegay”

NRSV “Caabudaya”

TEV “adeegay”

NJB “caabudaad Samayn”

Tani waa kalmada Giriiga ah ee *leitourgia* (goob compound “dadwayne” iyo “shaqo”) taasi oo noqonaysa qof hawl haya. Asal ahaana noqonaysa qof hawlaha danta guud ee bulshada qabta isagoo isticimaalaya kharashiisa uu is ka leeyay. Macnahan waxay sarbeebaysaa wakhti la samaynayo doonista mid ka hadlaysay Ilaah oo lagu jiro caabudaad thi. Kalmadan naxe ahaan FALka ah waxay noqon karta mid qusaysa kiniisada oo dhan amaba shanta nin la xusay oo kaliya.

▣ **“soomanaayeen”** Axidiga hore waxa jirtay hal maalin kaliya oo soon ah sannadkiiba, maalinta waaqdhaca, Laawiyiintii 16. hayeeshee, qarnigii kowaad, Culimadii diineed ee Yuhuudu waxay sameeyeen labo soon toddobaadkiiba. Inkasta oon soonka looga baahnayn rumaysteyaasha, haddana marar badan waa muhiim marka 1 doonayo in ay ahaato doonista Ilaah (cf. 14:23).

MAWDUUC GAAR AH: SOONKA

Soomista la soomo, inkastoo aan marna laynagu amrin Axdiga usub haddana Xerta Ciis waxaa laga rabaa in ay soomaan xilliga ku habboontime (cf. Matayos. 6:16,17; 9:15; Markos 2:19; Luukos 5:35). Soonka habboona waxaa qeexa Isacyaah 58. Ciise ayaa naftiisa tusaale sameeyay (cf. Matayos. 4:2). Kiiniisadii way soontay (cf. Fal 13:2-3; 14:23; II Kor. 6:5; 11:27). Ujeedka iyo habka loo soomayo ayaa ah muhiim; mudaynta, dhererka, iyo joogtayntu waa ikhyaari. Soonkii Axdigii hore maaha mid looga baahanyahay rumayste yaasha Axdiga Cusub (cf. Fal 15:19-29). Soonku ma sheegay ruuxa qofka qof leeyay, laakiin waa wuxuunbaa loogu dhwaadaa Ilaa si loo helo hanuunkiisa. Waxa uu noqonkaraa mid ruux ahaan waxtarle.

Doonista kiniisadii hore waxay ahyd in iska duwan qaribaadii ay culimadii Yahuudu sababeen soona galiyeen “soonka” dhawr meelood oo ka mid ah (i.e., Matayos. 17:21; Markos 9:29; Fal 10:30; I Korintos. 7:5). Warbixin dheeraad ah waxad ka raadisaa kitaabka uu qoray Bruce Metzger ee *A Textual Commentary on the Greek New Testament*, ayna daabacday United Bible Societies.

▣ **“Ruuxa Qoduska ahu wuxuu ku yidhi”** Tani waa caddayn kale oo kitaabi ah shakhsi ahaanta Ruuxa Qoduska ah. (eeg Mawduuca Gaarka ah 1:2). Lama garan karo in tani tahay mid la maqlay am so kadis aha isaga dhacday (cf. 8:29; 10:19; 11:12; 20:23; 21:11). sida muuqadada haddaba tani waxay ahayd fariin khaas (cf. 16:6-7), oo si hubbal ah loo siiyay mid ka mid ah nebiyada.

▣ **“iigu sooca”** Tani naxwe ahaan waa fal amar ah. kalmada *aphorizo* waxaa macne ahaan la mid tahay “quduus” (*hagiazo*). waxay maldahaysaa gaar ugu soocda una qalabaun hawl Rabaani ah oo gaar ah (cf. Rooma. 1:1; Galaatiya. 1:15).

Kaddib “iigu soocid” qoraalka af Giriiga ahnaxwe ahaan isku xidhaha *de*, taasi oo qeexda awood (cf. Luukos 2:15; I Korintos. 6:20). Waxaay I tusinaysaa u kululaansho yeedhmada Ruuxa. Waxaa la simaantahay hadalkii Bawlos ee ku yaal 15:36.

▣ “shuqulkii aan ugu yeedhay” Tani naxw ahaan waa FAL GOORDHAYD DHACY oo dheda galay (dhexgale) TILMAAME. Waa Ruuxa ka u yeedhayaa ee u qalabaynaya shaqda Ilaah (cf. I Korontos. 12:7,11).

13:3 aayadu waxay leeday naxw ahaan seddex sifo tilmaame oo qeexayaa diyaargaraytii Ruuxiga ahayd ee ahayd in laga diro Kiniisda Antiyoookh aadeegayaashii kowaad.

1. Soomeen
2. Duceeyeen
3. Gacmahooda dul saareen

Tani waxaa ka muuqata fal ay wadaa sameeyn dakii isu yimi oo dhan, kuma koobna nebiyada iyo macalimiinta oo kaliya . Kiniinsadu way ka midaysnayd bilowga shaqadii u adeegida Rabbiga!

▣ “gacmahoodii saareen” aadan khaaska ah waxay ka mid tahay qoraalada aan macnahahoda aan la caadyn karrin oo ay habka subkiddeen casriga ahi ku salaysantahay. hase ahaatee, waa mid aynaan si habboona ugu gudan kitaab ahaan habdhaqanadeena maalmahan. Waxa ku jira tusaale yaal badan oo “gacmo ” kitaabka

1. Axdiga hore qorshaha
 - a. aqoonsiga waaqdhacu (cf. Laawiyiintii. 1:4; 3:2; 4:4; 16:21)
 - b. barakaynta (cf. Bilowgii. 48:13ff; Matayos. 19:13,15)
 - c. awood u dhiibistii kii xilka la wareegay (cf. Tirintii. 27:23; Sharciga Kunoqoshadiisa. 34:9)
2. Axdiga cusub taariikh ahaan waxay u kal duwanyiin sida ay ugu kala duwanyiin bosiin
 - a. bogsiiinta (cf. Luukos 4:40; 13:13; Fal 9:17; 28:8)
 - b. u go’id ama gudashada shuqul (cf. Fal 6:6; 13:3)
 - c. la xidhiidhsan helitaanka Ruuxa Quduuska aha ama Hadiyada Ruuxiga (cf. Fal 8:17; 19:6; I Timoteyos. 4:14; II Timoteyos. 1:6)
 - d. ku taxaluqda aasaaska wax barita kiniisada Yahuuda (cf. Cibraaniyada. 6:2)

gacmo saaristani maa furitaanka waayo aragnimo. Nimankan mar hore ayaa loogu , hoggaamiye yaal hadiyado le oo shaqynaya. waxa loogu yeedhay maaha hsaqo cusub, laakiin baahintaa u adeegidii Ilaah ee markii hore hayeen.

Subkista waxaa looga danlaha in ay dhiirri galiso kala hawl duwanaasha rumaysteyaasha. waxaay siinaysay mid kastaa hadiyaddiisa ugu adeego. Ka Giriiga ah *cleros* (inay dhaxlaan wax badan) iyo *laos* (afka Giriiga ka dhigan dad), marka lagu isticimaalay Axdiga cusub, badiyaaba waxay ku saabsantahay kooxaha rumaystayaasha oo dhan. rumayste yaasha oo dhan waxaa loogu yeedhay qaar, hadiyadleh, adeege yaal buuxa oo Injiilka faafiyafull (cf. Efesos. 4:11-12). Ma jiraan caddaymo kitaabiya oo ka soocaysa rumayste yaasha kooxaha wax dhaxla. Dhammaan rumayste yaasha waxaa la siiyay hadiyad ay ugu adeegaan Jidhka Masiixa (cf. I Korintos. 12:7, 11).

NASB (UPDATED) TEXT: 13:4-12

⁴Haddaba iyagoo Ruuxa Qoduuska ahu soo diray waxay tageen Selukiya; meeshaasna waxay uga dhoofeen Qubrus. ⁵Oo kolkay Salamis jooheen, hadalkii Ilaah bay ku wacdiyeen sunagogyada Yuhuudda; oo Yooxanaa ayay kaaliye u haysteen. ⁶Oo kolkay gasiiraddii oo dhan dhex mareen ayay waxay yimaadeen Bafos, taas oo ay kala kulmeen nin saaxir ah oo ahaa nebi been ah oo Yuhuudi ah oo magiciisa la odhan jiray Barciise; ⁷kaas oo la jiray taliye Sergiyos Bawlos oo ahaa nin garasha leh. Kaasu markuu u yeedhay Barnabas iyo Sawlos, wuxuu doonayay inuu hadalka Ilaah maqlo. ⁸laakiin waxaa iyagii ka hor istaagay saaxirka Elumas (oo sidaas magiciisa loo fasiri jiray), oo wuxuu isku deyayay inuu taliyihii ka lexiyo iimaanka. ⁹laakiin Sawlos, oo ahaa Bawlos, kaasoo Ruuxa Qoduuska ahu ka buuxsamay, ayaa aad u fiiriyey, ¹⁰oo ku yidhi, Kaaga khiyaanada iyo xumaanta oo dhammu ka buuxsantay oo ah wiilka Ibiiska iyo cadowga xaqnimada oo dhan, miyaanad ka joogsanayn qalloocinta aad ku qalloocinaysid jidadka toosan oo Rabbiga? ¹¹Haddaba, bal eeg, gacanta Rabbigu waa ku saaran tahay, oo waad indha beeli doontaa, adigoo aan qorraxda arkayn intii wakhti ah. Kolkaasaa markiiba waxaa ku soo dhacday isagii ceeryaamo iyo gudcur; wuuna warwareegay oo doondoonyay nin gacanta ku haga. ¹²Kolkaasaa taliyihii, kolkuu arkay wixii dhacay, rumaystay, isagoo ka yaabsan Rabbiga waxbariddiisa.

13:4 “iyagoo Ruuxa Qoduuska ahu soo diray” macnahani ma sheegayo awoodda ay leedahay kaniisadda maxalliga ahi, laakiin waxa uu sheegayaa awoodda Ruuxa. Waxa uu ka qayb yahay Saddexmidnimada (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:32) ee lagu sheegay Falimaha Rasuullada. “Casriga cusub ee Masiixa” waxa loo yaqaanay “casriga Ruuxa.” Wuu u yeedhaa, hadiyad siiyaa, jiheeyaa, qanciyaa, awoodna siiyaa (cf. Yooxanaa 14:16-17,26; 15:26; 16:7-15). Ma jirto adeegis ku meel gaadha oo wax ku ool noqonaysa isla markaana imanaysa iyada oo aan ku imanaynin joogitaankiisa iyo barakadayntiisa.

▣ **“Selukiya”** waxa ay ahayd magaalada dekedda u ah Antiyokhdii Siiriya. Waxa ay dhinaca koonfur galbeed ka xigtaa ilaa shan iyo toban mayl. Magaceeduna waxa uu u noqonayaa Aleksandarkii Waynaa (Seluki), kaasoo halkaas xukumay dhimashadii Aleksandar dabadeed.

▣ **“Qubrus”** meeshani waxay ahayd halkuu deganaa Barnabas (4:36) halkaasna waxa ku noolaa Yuhuud tiro badan. Axdiga Hore dhexdiisa waxa loo yaqaanaa *Kittim*. Tani may ahayn markii ugu horraysay ee jasiiraddan ay Masiixiyiintu ka markhaati furaan (cf. 11:19-20).

13:5 “Salamis” waxa ay ahayd dekedda xeebta bari ee jasiiradda Qubrus. Waxa ay ahaydna xarunta ganacsiga ee jasiiradda.

▣ **“they began to proclaim the word of God in the synagogue”** The reason for this is obvious. these Jews already knew the OT Jews were the chosen people (cf. Gen. 12:1-3) and had the first opportunity to respond (cf. 3:26; 13:46; 17:2; 18:4,19; 19:8; Rom. 1:16) in the synagogue services were Gentiles who [a] had already been attracted to the one true God and [b] knew the OT

This became Paul’s regular missionary method wherever there was a synagogue.

▣ **“hadalkii Ilaah bay ku wacdiyeen sunagogyada”** sababta arrintani way cadahay.

1. Yuhuuddu ugu horraynba way yaqaaneen Axdiga Hore
2. Yuhuuddu waxay ahaayeen dadka la doortay (cf. Bilowgii. 12:1-3) waxayna haysteen jaaniska ugu horreeya ee ka jawaab celinta (cf. 3:26; 13:46; 17:2; 18:4,19; 19:8; Rooma. 1:16)
3. Sunagogyada adeeggooda waxa dhex joogay kuwo aan Yuhuud ahayn [a] oo ka helay hal Ilaah oo keliya runna ah iyo [b] yaqaanay Axdiga Hore.

Tanina waxa ay noqotay adeegii joogtada ahaa ee Bawlos oo ahaa meelkasta oo uu ku yaallo Sunagog.

▣ **“Yooxanaa”** waxa ay middani tilmaamaysaa Yooxanaa Markos oo ahaa kii gurigiisa ay ku kulmi jireen xertu (cf. Fal 12:12). Sidoo kale waa qoraaga injiilka Markos, isaga oo u muuqda inuu yahay mid ka markhaati ahaa markhaati furkii Rasuul Butros. Sidoo kale isaga waa kii sababay dooddii waynayd ee ka dhex dhacday Bawlos iyo Barnabas oo kala qaybisay kooxdii adeegitaanka wadday (cf. 15:36-41). Si kastaba ha ahaatee, mardanbe ayaa Yooxanaa Markos uu u hadlayaa si wanaagsan (cf. Kolosay. 4:10; II Timoteyos. 4:11 iyo Filemon aayadda. 24). Eeg fiirada cutubka 16.

13:6 “Oo kolkay gasiiraddii oo dhan dhex mareen” tani waxa ay tusinaysaa in ay ku hakadeen oo wax ka wacdiyeen sunagog kasta oo ku yaallay jasiiradda.

▣ **“Bafos”** waxa ay middani sheegaysaa Bafos cusub oo khilaafaysa kana fog magaaladii gabowday ee Fonesiyaanka toddobo mayl. Labadan magaaloba magacaabistooda waxa ka danbeeyay ilaahii *Paphian*. Waxa uu ahaa ilaaha jacaylka sidoo kalena waxa loo yaqaanay *Aphrodite*, *Astarte*, *Venus*, iwm. Magaaladani waxay caasimadda siyaasadeed u ahayd Qubrus.

▣ **“Barciise”** ninkani waxa uu ahaa Yuhuudi ah nebi beena. Magaciisu waxa uu la macno yahay “ina Yashuuca.” Waxa aan aayadda 8 ka baranaynaa in lagu magacaabay Elumas oo ah saaxirka. Ereygan saaxir waxa uu ka tarjumayaa asalka ereyga Aramaatiga ah ee “sorcerer” (aayadda 10). Eeg Mawduuca Gaarka ah 8:9.

13:7 “taliye Sergiyos Bawlos” waxa jirta falaqayn badan oo ku saabsan taariikhaynta Luukos waxyaalaha uu diiwan gelinayo. Halkanna waxa ah tusaale wanaagsan oo tusinaya saxsanaanta taariikhda Luukos. Ninkan waxa uu ku magacaabayaa “taliye” taasi oo macneheedu yahay in Qubrus ay ahayd gobol ka tirsan Maamulkii Roomaanka. Waxa aan middan ka baranaynaa iyadoo kusoo aroortay amar kasoo baxay Augustus sanadkii C.D. 22. Sidoo kale waxa aan qoraallada Laatiinka ee Soloi ka baranaynaa in Taliye Bawlos uu taliyanimadiisa bilaabay C.D. 53. Markasta oo cilmiga baadha taariikhaha qadiimka ahi uu wax ka helo bari dhexena waxa sii kordhaysa saxsanaanta taariikhda uu soo tebinayo Luukos.

▣ **“nin garasha leh”** eraygan waxa la adeegsaday isaga oo dhinacyo badan oo kala duwan ka hadlayay. Macnaha halkan uu ugu jiraa waxa uu tusinayaa isaga oo awood u lahaa inuu si karti iyo hufnaan leh wax u maamulayay. Sidoo kale qaabkan oo isaga loo sifeeyay waxa ay tusinaysaa in injiilku aanu saamaynin keliya dadka saboolka ah iyo kuwa aan aqoonta lahayn, balse uu sidoo kale saameeyay dadka hodanka ah iyo kuwa aqoonta leh (cf. *Manaen* 13:1). Sidoo kale waxa suurto gal ah in ujeedada Luukos ay ahayd marka uu qorayay Falimaha Rasuullada inuu tusiyo injiilka oon hanjabaad ku ahayn xukunka Roomaanka.

13:8 “Elumas” waxay u muuqataa in magacan Giriigga ahi uu yahay tarjumaadda

1. Erey Carabi ah oo loo adeegsado ninka xikmadda leh (nin wax kasii sheega mustaqbalka isaga oo maamulaya awoodaha aan la arki karin ee maamulka aan muuqanin, AB, vol. 2, p. 487)
2. Eray Aramaati ah oo lagu magacaabo qofka fasira riyoyinka.

▣ **“saaxirka”** middani waxay la xidhiidhaa ereyga “sixir,” kaasi oo lagu tilmaamo niman xikmad leh, sida Daanyeel (cf. Daanyeel. 2:2; 4:9; Matayos. 2:1). Si kastaba ha ahaatee, maalmihii Bawlos, waxa loo adeegsan jiray saaxiriinta iyo kuwii layaabka ka samayn jiray dunidii Giriigga iyo Roomaanka. Eeg Mawduuca Gaarka ah 8:9.

▣ **“iimaanka”** ereygan saddex siyaabood oo gaar ah ayaa loo adeegsaday Axdiga Cusub dhexdiisa:

1. talo saarashada shakhsi ahaaneed ee la tala saaro Ciise Masiix inuu yahay Badbaadiyaha
2. rumaysad yeelasho, nolol cibaado leh
3. fahanka fiqi ahaaneed ee injiilka (caqiido, Yuudas 3, 20)

Middan oo kale waxay ka muuqanaysaa Fal 6:7. Halkanna waxay u muuqataa in ay tilmaamayso #3 sida uu toosinayo shaqalka iyo macnuhu. Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:16 iyo 6:5.

13:9 “Bawlos” waa markii ugu horreysay ee magacan Roomaanka ah lagu adeegsado Falimaha Rasuullada. Bawlos waxa uu kasoo jeedaa ereyga Giriigga ah ee macnihiisu yahay “waxyar.” Qaar ayaa u malaynaysa inay tilmaamayso Bawlos oo jidh yar ahaa, halka kuwo kalena ka sheegayaan inay ka tilmaamayso qiimayntiisa shakhsi ahaaneed isagoo ahaa “ka ugu hooseeya rasuullada” maxaa yeelay waxa uu cadaadiyay kaniisadda. Waxa uu ahaa magaca labaad ee ay u bixiyeen waalidiintiisu markii uu dhashay.

▣ **“Bawlos, kaasoo Ruuxa Qoduuska ahu ka buuxsamay”** awoodda Ruuxa hagayay kaniisaddii ugu horraysay waxa lagu tibaaxay erayga ah “ka buuxsamitaan” cf. 2:4; 4:8,31; 6:3; 7:55; 9:17; 13:9,52). Ka buuxsamitaanka maalin walba ah ee Ruuxu waxa weeyi xaaladda caadiga ah ee dhammaanba rumaystayaasha (Efesos 5:18). Falimaha Rasuullada dhexdiisa hadiyo goor waxa ay la xidhiidhaa ku dhiirshada ku wacdinta injiilka.

▣ **“aad u fiiriyey”** eeg fiirada 1:10.

13:10 Bawlos nebigan Yuhuudiga ah ee beenta ah waxa uu ku tilmaamayaa ereyo dhowr ah

1. “khiyaano ka buuxdo” oo macneheedu yahay been wax ku khiyaanaynaya (waana marka keliya ee Luukos uu qoraalladiisa ku adeegsaday)
2. “xumaanta oo dhammu ka buuxdo” waxa ay kasoo jeedaa ereyga Giriigga ah oo macneheedu yahay waxyaalo xumaani ku jirto oo la sameeyo xidhiidhna la leh sharka (18:14). Ereygan waxa laga helayaa oo keliya Falimaha Rasuullada (cf. 13:10; 18:14).

3. “wiilka ibliiska” waa erey semetic ah (cf. 3:25; 4:36) oo loo adeegsado falalka sharka ah (cf. Matayos. 13:38; Yooxanaa 8:38,41,44, eeg Mawduuca Gaarka ah 5:3)
4. “cadowga xaqnimada oo dhan,” ereygan waxa qoraallada Luukos lagu adeegsaday marar badan iyadoo koobsanaysa xigashooyinka Axdiga Hore (cf. Luukos 1:71,74; 20:43; Fal 2:35). Ninkanina waxa uu kasoo horjeeday Ilaah. eeg Mawduuca Gaarka ah 3:14.
5. Bawlos waxa uu adeegsanayaa ereyga koobsiga “dhammaan” saddex jeer isaga oo tusinaya xumaanta buuxda ee ninkani leeyahay.

▣ **“qalloocinaysid jidadka toosan oo Rabbiga”** su’aashani waxa ay filaysaa jawaab “haa” ah. ereyga “toosan” Axdiga Cusub dhexdiisa waxa uu ka tarjumayaa fikirka Axdiga Hore ee xaqnimada, kaasi oo loogala jeedo heer ama shay wax lagu qiyaaso. Kelmadaha Axdiga Cusub ee “qalloocin” ama “leexin” waxa ay ka tarjumayaan ereyada Axdiga Hore ee loo adeegsado denbiga, kaasi oo ah mid ka durugsan heerka ama sifada Ilaah ku sifoobay. Ninkani waxa uu sameeyay wax kasta oo qalloocan (kasoo horjeeda xaqnimada). Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:14.

13:11 “gacanta Rabbigu” middani waa weedho lagu shabaho awoodda iyo joogitaanka YHWH (cf. Luukos 1:66; Fal 11:21). Axdiga Hore dhexdiisana waxa ay badanaa lagu sheegay xukunka Ilaah (cf. Baxniintii. 9:3; I Samuu’eel. 5:6; Ayuub 19:21; 23:2; Sabuurka. 32:4; 38:2; 39:10), sida halkanba ay ku sheegayso.

▣ **“waad indha beeli doontaa”** tilmaamitaankan xooggan ee ah adeegsiga tusinaya sharka iyo caasinimada isla markaana uu Bawlos ninkan ku sheegayo waxa xukunka ilaahiga ahi uu ka tarjumi karaa noloshii hore ee Bawlos uu ku noolaa. Dib ayuu u laabanayaa isaga oo naftiisa ka arkaya macallinkan beenta ah ee Yuhuudiga ah iyo waxyaalaha uu sheeganayo (9:8).

Indho la’aanta badanaa waxa loo adeegsaday ah macno misaal ah isla markaasna tusinaysa qof aanu ku jirin ruuxu (cf. Yooxanaa 9; Fal 9; sidoo kale u fiirso Sharciga Kunoqoshadiisa. 28:28-29).

13:12 “kolkuu arkay wixii dhacay, rumaystay” tani waxay la mid tahay kelmadda Giriigga ah (*pistuo*, magaca waxa loo tarjumi karaa rumaysad, iimaan, ama isku hallayn) ee lagu adeegsaday Axdiga Cusub oo dhan loona adeegsaday rumaysadka. Taliyahani waxa uu ka jawaab celiyay injiilka farriintiisa. Nin indhihiisu waxay xidhnaayeen (macno ahaan); mid kalena indhihiisu way furmeen (shabahaad). Tani waa qarsoodiga rumaysiga iyo rumaysad darrada (Yooxanaa 9). Eeg Mawduucyada Gaarka ah: Rumays (magac, fal, iyo sifo) 3:16 iyo Rumaysadka Axdiga Hore 6:5.

NASB (UPDATED) TEXT: 13:13-16a

¹³Haddaba Bawlos iyo kuwii la socday ayaa ka dhoofay Bafos, oo waxay yimaadeen Berga oo Bamfuliya ku jirta; markaasaa Yooxanaa ka tegey iyagii oo Yerusaleem ku noqday. ¹⁴laakiin iyagu kolkii ay ka tageen Berga waxay yimaadeen Antiyokh oo Bisidiya ku jirta; oo maalintii Sabtidana sunagogga ayay galeen oo fadhiisteen. ¹⁵Markii sharcigii iyo nebiyadii la akhriyey dabadeed kuwii sunagogga u sarreeyey ayaa cid u soo diray iyagoo leh, Walaalayaalow, haddaad dadka u haysaan hadal waana ah, dhaha. ¹⁶Markaasaa Bawlos istaagay isagoo gacan haadinaya, oo wuxuu yidhi

13:13 “Bawlos iyo kuwii la socday” waxa cad oo muuqata iyada oo hoggaankii uu is bedelay. Hadda kaddib kitaabka Falimaha Rasuullada waxa ugu horreeya ee lagu diiwaan gelinayaa waa magaca Bawlos.

▣ **“Berga oo Bamfuliya ku jirta”** Berga waxay ahayd magaalada ugu wayn gobolkii Roomaanka ahaa ee yaraa isla markaasna ku yaallay xeebta Bamfuliya (badhtamaha koonfureed ee Turkiga). Waxa ay dhowr mayl gudaha uugu jirtay berriga iyadoo xeebta looga fogeeyay si ay u niyad jabaan kuwo xagga badda kagasoo duulaa. Waxa kaloo iyana intaas ka gaara iyada oo Bawlos aanu halkan wax wacdina ka samaynin wakhtigan, laakiin mar danbe ayuu ka sameeyay (14:25). Ma jirto caddayn taariikhi ah oo tusinaysa koox Masiixiyiin ah oo agagaarahan ku noolaa boqolaal sano. Waxaanu halkan usii maray gobollada xeebta.

▣ **“markaasaa Yooxanaa ka tegey iyagii oo Yeruusaalem ku noqday”** Luukos waxa uu diiwaan gelinayaa dhacdadan, laakiin tusin maayo sababta (sidoo kalena ma jiro qoraayada Axdiga Cusub mid arrintan wax ka qorayaa). Eeg hordhaca cutubka 16, waxa uu usoo laabtay u adeegitaanka Rabbiga!

13:14 “Antiyokh oo Bisidiya ku jirta” waxa loogala jeedaa “Antiyokhdii xagga Bisidiya” waayo waxa ay ku taallay dhulkii qabiillada Firigiya ee gobolkii Roomaanka ee Galatiya. Degmadan waxa ku noolaa qabiillo kasoo jeeday Yurub.

▣ **“maalintii Sabtidana”** waxa tani ay sheegaysaa laga bilaabo Jimcaha marka ay cadceedu dhacdo iyada oo noqonaysa Sabti. Yuhuuddu waxay wakhtiga ka tirin jireen habeen ilaa ka habeen, iyaga oo raacaya Bilowgii 1.

▣ **“oo fadhiisteen”** waxa laga yaabaa in midani ay tahay hadal maldahan oo lagu toosinayo qof raba inuu ka hadlo sunagoga. Rabbaaniyuuntu hadiyo goorba waxay dadka wax bari jiree niyada oo la fadhiyo (cf. Matayos. 5:1; Luukos 4:20). Sunagogyadu si joogto ah waxay dadka booqashada ku yimaadda siin jireen jaanis ay ku hadlaan haddii ay rabaan (aayadda 15).

▣ **13:15 “sharcigii iyo nebiyadii la akhriyey”** tani waxa ay qayb ka ahayd adeegga laga samayn jiray sunagoga maalmihii Ciise. Asal ahaan Sharciga Muuse ayaa la akhriyi jiray, laakiin Antiyochus IV Epiphanes ayaa middan mamnuucay sanadkii 163 C.H. kaddibna Yuhuuddu waxa ay ku bedesheen akhrinta Nebiyada. Xilligii kacdoonkii Maccabeen, ayaa diinta Yuhuudda dib loo fasaxay oo Sharciga iyo Nebiyadaba si wada jira ayaa loo akhriyi jiray waxaanay asaasi u ahaayeen adeegyada sunagogyada (aayadda 27). Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: QORNIINKA CIBRAANIGA

Kitaabka Cibraaniga ahi waxa uu u qaybsanyahay saddex qayboo (kitaabka Ingiriisida ahina waxa uu raacayaa nidaamka Sabtuujantiga)

1. Tawreed (Shanta kitaab), Bilowgii-Sharciga Kunoqoshadiisa
2. Nebiyadii
 - a. nebiyadii hore, Yashuuca-Boqorradii (marka laga reebo Ruud)
 - b. nebiyadii danbe, Ishacyaah- Malaakii (marka laga reebo Baroorashadii Yeremyaah iyo Daanyeel)
3. Qoraalladii
 - a. Qoraallada Xikmadda, Ayuub- Maahmaaydadii
 - b. Qoraalladii ka horreeyay musaafurinta, Cesraa-Esteer
 - c. Megilloth (shan qoraal)
 - (1) Ruud (akhri Bentekostigii)
 - (2) Wacdiyihii (akhri waababka)
 - (3) Gabaygii Sulaymaan (ka akhri Kormarista)
 - (4) Baroorashadii Yeremyaah (akhri si aad u xusuusato dhicitaankii Yeruusaalem 586 C.H.)
 - (5) Esteer(akhri Purim)
 - d. Daanyeel
 - e. I iyo II Taariikhadii

▣ **“kuwii sunagogga u sarreeyey”** kuwani waxay ahaayeen kuwii ka masuulka ahaa dhismaha hagaajintiisa iyo diyaarinta adeegyada caabudaadda (cf. Luukos 8:41,49). Badanaa waxay dadka martida ah ku casuumi jireen inay hadlaan.

▣ **“haddaad dadka u haysaan hadal waana ah, dhaha”** tani waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah, waxaanay u muuqataa in ay run ka tahay marka laga eego dhinaca qoraaga iyo ujeedadiisa. Tani waxa ay ahayd arrin caadi ka ah caabudaadda sunagoga. Bawlosna si buuxda ayuu jaaniskan uuga faa’idaystay.

13:16 “Markaasaa Bawlos istaagay” hadiyo goor macallimiinta Yuhuuddu markay waxbarayaan way fadhiisan jireen; si kastabana ha ahaatee, waxa istaagitaanka dhaqan looga lahaa Roomaanka iyo Giriigga marka ay wax barayaan. Bawlos waxa waxa uu bedelay qaabkii uu dadka uula hadli lahaa.

▣ **“isagoo gacan haadinaya”** Bawlos waxa uu rabay in la aamuso. Luukosna waxa uu middan u sheegayaa sidii markhaati goob jooga badanaa marka uu faahfaahinta bixinayo (cf. 12:17; 13:16; 19:33; 21:40).

NASB (UPDATED) TEXT: 13:16b-25

^{16b}Nimanka reer bini Israa'iilow iyo kuwiinna Ilaah ka cabsadow, dhegaysta. ¹⁷Ilaaha dadkan reer bini Israa'iil wuxuu doortay awowayaasheen, dadkana buu sarraysiiyey markay dhulka Masar degganaayeen, oo gacan taagan buuna kaga soo saaray iyagii. ¹⁸Oo wakhti abbaaraha afartan sannadood ah ayuu dabiicaddoodii ugu dulqaatay cidlada. ¹⁹Oo markuu toddoba quruumood ka baabi'iyey dhulka Kancaan dabadeed ayuu dhulkoodii dhaxal u siiyey iyagii abbaaraha afar boqol iyo konton sannadood; ²⁰waxyaalahaas dabadeedna wuxuu siiyey xaakinno ilaa nebi Samu'eel. ²¹Dabadeed waxay weydiisteen boqor. markaasaa Ilaah wuxuu iyagii siiyey Saa'uul ina Qiish oo ahaa nin reer Benyaamiin intii afartan sannadood ah. ²²Kolkuu isagii boqortooyadii ka wareejiyeyna, wuxuu u kiciyey iyagii Daa'uud inuu boqorkooda noqdo; kaasoo uu u markhaati furay isagoo leh, Waxaan ogaaday Daa'uud oo ina Yesay ah inuu yahay nin ah sida qalbigaygu doonayo oo samayn doona waxaan doonayo oo dhan ²³Ninkan farcankiisii Ilaah siduu ballan qaaday ayuu Israa'iil ugaga keenay Badbaadiye kaasoo ah Ciise; ²⁴oo intuusan imanba, Yooxanaa wuxuu dadka Israa'iil oo dhan hore ugu wacdiyey baabtiiska toobadda. ²⁵Oo intii Yooxanaa shuqulkiisa dhammaynayay, wuxuu yidhi, Yaad u malaynaysaan inaan ahay? Anigu isagii ma ihi. Laakiin, bal eega, waxaa iga daba imanaya mid aanan istaahilin inaan kabaha caghiisa ka furo.

13:16b “Nimanka reer bini Israa'iilow iyo kuwiinna Ilaah ka cabsadow, dhegaysta” Waxa joogay meeshaas labo kooxood, oo isugu jiray Yuhuud iyo kuwo aan ahayn (cf. aayadaha. 26; 10:2,22,35). Wacdintani waxa ay aad uugu eegtahay wacdintii Istifanos sida ku sugan Falimaha Rasuullada 7. Siyaabo badan ayaa Bawlos waxa u saameeyay Istefanos fahankii uu ka qabay Axdiga Hore iyo injiilka.

13:17 Bawlos waxa uu ku bilaabay isaga oo dib u muraajacaynaya taariikhda Axdiga Hore iyo yeedhitaankii wadaaddadii (Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub sida ku xusan Bilowgii) iyo kasoo samata bixintii Masar (Baxniintii-Sharciga Kunoqoshadiisa).

▣ **“oo gacan taagan buuna kaga soo saaray iyagii”** waa muuqaal ka muuqanaya Axdiga Hore (LXX Baxniintii 6;1, 6) ee YHWH iyadoo ah ereyo jidh ahaan ah. Waxa ay la mid tahay ereyada, “gacantiisa midig.” Kitaabku waxa uu Ilaah uuga isagoo adeegsanaya erayo bani aadam ah (shabahaad) inkasta oo uu yahay mid daa'im ah, isla markaasna aan lagu tilmaami karin jidh laakiin ku sifoobay Ruux. Tusaalayaashan kitaabiga ahi waxa loo adeegsaday fahano qaldan iyo fasiraado toos ah oo Ilaah lagala mid dhigayo aadane. Kitaabka Ilaah tusaale ahaan ayuu uuga hadlayaa iyo shabahaad. Ilaah aad ayuu uuga fogyahay in lagu tilmaamo oo lagala mid dhigo aadanaha leexday iyo waxyaalaha ku nool dunida guudkeeda oo dhan. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:33.

13:18 “Oo wakhti abbaaraha afartan sannadood ah ayuu dabiicaddoodii ugu dulqaatay cidlada” middani waxay ka tarjumaysaa Sharciga Kunoqoshadiisa 1:31 “la quudiyay” (cf. MSS A, C). waxa ay middani ka tarjumaysaa kitaabbada Axdiga Hore ee Baxniintii iyo Tirintii.

Ereyga “afartan” badanaa waa nambor wareegsan. Suugaan ahaan wakhtigii Xooreeb ilaa Shitim waxa uu ahaa soddon iyo sideed sano waxaana la socday labo sano oo ahaa Xooreeb (Siinay). Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3.

13:19 “toddoba quruumood ka baabi'iyey” quruumihii Falastiin waxa loo sheegay siyaabo dhowra oo kala duwan.

1. ereyo ururin ah, reer Kancaan (i.e., dhulka jooggiisu hooseeyo kuwa ku nool, cf. Bilowgii. 10:18-29; Xaakinnadii. 1:1) ama reer Amor (i.e., dhulsare ku nool, cf. Bilowgii. 15:16)
2. labo quruumood (Kancaaniyiin, reer Feris, cf. Bilowgii. 13:7; 34:30; Xaakinnadii. 1:4-5)

3. saddex quruumood (reer Xiwi, Kancaaniyiin, reer Xeet, cf. Baxniintii. 23:28)
4. lix quruumood (Kancaaniyiin, reer Xiwi, reer Amor, reer Feris, reer Xeet, reer Yebuus, cf. Baxniintii. 3:8,17; 33:2; 34:11; Sharciga Kunoqoshadiisa. 20:17; Yashuuca. 9:1; 12:8)
5. toddobo quruumood (reer Xeet, reer Girgaash, reer Amor, reer Kancaan, reer Feris, reer Xiwi, reer Yebuus, cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 7:1; Yashuuca. 3:10; 24:11)
6. toban quruumood (reer Qeyn, reer Qenas, reer Qadmon, reer Xeet, reer Feris, reer Refaa'iim, reer Amor, reer Kancaan, reer Girgaash, reer Yebuus, cf. Bilowgii. 15:19-21).

MAWDUUC GAAR AH: DADKII ISRAA'IIL KA HORREEYAY EE DEGENAA FALASTIIN

A. Waxa jiray dadyow dhowr ah

1. Bilowgii 15:19-21 (10)

- | | | | |
|----------------|-------------------|-----------------|----------------|
| a. reer Qeyn | d. reer Xeet | g. reer Amor | j. reer Yebuus |
| b. reer Qenas | e. reer Feris | h. reer Kancaan | |
| c. reer Qadmon | f. reer Refaa'iim | i. Girgaash | |

2. Baxniintii 3:17 (6)

- | | |
|-----------------|----------------|
| a. reer Kancaan | d. reer Feris |
| b. reer Xeet | e. reer Xiwi |
| c. reer Amor | f. reer Yebuus |

3. Baxniintii 23:28 (3)

- | | |
|-----------------|--------------|
| a. reer Xiwi | c. reer Xeet |
| b. reer Kancaan | |

4. Sharciga Kunoqoshadiisa 7:1 (7)

- | | | |
|--------------|-----------------|----------------|
| a. reer Xeet | d. reer Kancaan | g. reer Yebuus |
| b. Girgaash | e. reer Feris | |
| c. reer Amor | f. reer Xiwi | |

5. Yashuuca 24:11 (7)

- | | | |
|-----------------|--------------|----------------|
| a. reer Amor | d. reer Xeet | g. reer Yebuus |
| b. reer Feris | e. Girgaash | |
| c. reer Kancaan | f. reer Xiwi | |

B. Asalka magacyada lama garanayo sababtuna waa iyadoon la haynin diiwaano taariikh ah. Bilowgii 10:15-19

C. Qeexitaan faahfaahsan oo ah liiska ugu dheeri waxa uu ku jiraa Bilowgii. 15:19-21

1. reer Qeyn – BDB 884
– aan ahayn Israa'iliyiin
– magacyo la xidhiidha “been” ama “tumaal,” kaasi oo tilmaami kara shaqo bir ama miyuusi (cf. Bilowgii. 4:19-22)
– connected to the area of Sinai north to Hebron
– name connected to Jethro, Moses’ father-in-law (cf. Jdgs. 1:16; 4:11)
2. reer Qenas – BDB 889
– qaraabo Yuhuudeed
– qabiilka Edom (cf. Bilowgii. 15:19)
– ku noolaa Negev
– waxa suurto gala in la keenay Yahuuda (cf. Tirintii. 32:12; Yashuuca. 14:6,14)
3. reer Qadmon – BDB 870 II
– aan ahayn Yuhuudd, suuro gal inay yihiin farcankii Ismaaciil (cf. Bilowgii. 25:15).
– magac la xidhiidha “reer bari”
– ku noolaaday Negev
– suuro gal inuu la xidhiidho “nimanka bariga” (cf. Ayuub 1:3)

4. reer Xeet – BDB 366
 – aan ahayn Israa’iliyiin
 – faracii Xeet
 – ka ahaaday boqortooyadii Anatoliya (Aasiyada Yar, Turkiga)
 – wakhti hore ayay jooheen Kancaan (cf. Bilowgii 23; Yashuuca. 11:3)
5. reer Feris – BDB 827
 – aan ahayn Israa’iliyiin, suurto gal inay yihiin reer Hurriyeen
 – ku noolaayeen Yahuuda (cf. Bilowgii. 34:30; Xaakinnadii. 1:4; 16:10)
 6. reer Refaa’iim – BDB 952
 – aan ahayn Israa’iliyiin, suurto gal inay yihiin gayantiyiin (cf. Bilowgii. 14:5; Tirintii. 33:33; Sharciga Kunoqoshadiisa. 2:10-11,20)
 – ku noolaa dhinaca bari ee Urdun (cf. Bilowgii. 15:20; Yashuuca. 12:4; 13:12; Sharciga Kunoqoshadiisa. 2:8-11,20; 3:13) ama dhinaca galbeed (cf. Yashuuca. 15:8; 17:15; II Samuu’eel. 5:18,22; 23:13; I Taariikhdi. 20:4)
 – laynka dagaalyahannadii/geesiyadii
7. reer Amor – BDB 57
 – dadkii woqooyi galbeed ahna koox reer Xaam ah (cf. Bilowgii. 10:16)
 – calaamad u noqday dadkii deganaa Kancaan (cf. Bilowgii. 15:16; Sharciga Kunoqoshadiisa. 1:7; Yashuuca. 10:5; 24:15; II Samuu’eel. 21:2)
 – magaca macnihiisu wuxuu noqon karaa “galbeedka”
 – ISBE ga, vol. 1, p. 119, ayaa leh ereygu wuxuu tusinayaa
 a. guud ahaan dadkii deganaa Falastiin
 b. dadkii oogada sare ee kasoo horjeeday bannaankii xeebta
 c. dad gaara oo lahaa boqorkooda u gaarka ah
8. reer Kancaan – BDB 489
 – kasoo jeeda Xaam (cf. Bilowgii. 10:15)
 – calaamad u gaara dhammaan qabiilooyinkii deganaa Kancaan galbeedka Urdun
 – in loogala jeedo Kancaan lama hubo, waxa suurto gala “ganacsi” ama “midab basali casaan xiga”
 – iyagoo kooxa waxay dhex jooheen bannaanka xeebta (cf. Tirintii. 13:29)
9. reer Girgaash – BDB 173
 – kasoojeeda Xaam (cf. Bilowgii. 10:16) ama ugu yaraan “kasoo ah ina [i.e., waddanka] Kancaan,” ISBE, vol. 2, p.1232)
10. reer Yebuus – BDB 101
 – kasoo jeeda Xaam (cf. Bilowgii. 10:16)
 – kasoo jeeda magaaladii Yebuus/Salem/Yerusaalem (cf. Yashuuca. 15:63; Xaakinnadii. 19:10)
 – Yexesqeel. 16:3,45 ayaa sheegaya inay ahaayeen cirqi isku jira oo ah reer Amor iyo reer reer Xiwi
11. reer Xiwi – BDB 295
 – kasoo jeeda Xaam (cf. Bilowgii. 10:17)
 – LXX ku wuxuu u tarjumay Horite (cf. Bilowgii. 34:2; 36:20-30; Yashuuca. 9:7)
 – waxa suuro gala inay kasoo jeedo ereyga Cibraaniga ah ee “god,” sidaas darteedna waxa laga yaabaa inay ahaayeen kuwo godad gala
 – waxay ku noolaayeen dhulka sare ee Lubnaan (cf. Yashuuca. 11:3; Xaakinnadii. 3:3). Sida ku sugan II Samuu’eel. 24:7 waxa lagu xigsiyay Tuross iyo Siidoon

▣ **“dhaxal”** ereyada saddexda ah ee koobsanaya *kata + klēros + nemō* waxa uu caan ku yahay Sebtuujantiga, laakiin Axdiga Cusub dhexdiisa halkan ayaa lagu adeegsaday (qoraallada kale waxay dhigayaan *kata + klēros + didōmi*). Waxa ay ka tarjumaysaa waxyaalo badan oo khuseeya ku qaybinta Dhulka Ballanqaadka ee qabiillada (cf. Yashuuca. 13-19). Ereyga *kl'ros* waa halka aan ka heli karno ereyga Ingiriisida ah ee “dad cibaado sameeya,” laakiin Axdiga Cusub dhexdiisa hadiyo goor waxa ay sheegaysaa rumaystayaasha, oon ahayn koox kale!

▣ **“abbaaraha afar boqol iyo konton sannadood”** waxa tiradani ay u muuqataa in uu ka yimid:

1. 400 sano addoonsigii Masar (cf. Bilowgii. 15:13)
2. 40 sano oo cidlada ahaa (cf. Baxniintii. 16:35; Tirintii. 14:33-34; 32:13)
3. 7-10 sano qabsashadii (cf. Yashuuca. 14:7,10)

Textus Receptus (KJV) waxa uu tirada ku darayaa aayadda 20 waxaanay u muuqataa inuu soo guda gelinayo Xaakinnadii (isagoo raacaya Josephus, *Antiq.* 8.3.1), laakiin ereyeyntani kuma sugna qoraal gacmeedyada ugu horreeyay Giriigga (cf. a, A, B, C), kaasi oo ku habboon I Boqorradii 6:1 taariikhayntooda. Jiitinta waxa laga helayaa NASB waa in ay xoojiso meesha ugu habboon tirada.

13:20 tani waxa ay sheegaysaa wakhtiga kasoo bilaabmaya Xaakinnadii ilaa I Samuu'eel 7.

13:21 waxa ay sheegaysaa I Samuu'eel. 8-10.

▣ **“intii afartan sannadood ah”** wakhtiyayntan lagama helayo Axdiga Hore dhexdiisa ilaa inta aanu dhibaataada qoraal gacmeedka Axdiga Cusub aanay la xidhiidhin I Samuu'eel 13:1 oo koobsanaysa “afartan” (NIV). Josephus, *Antiq.* 6.14.9 sidoo kale waxa ay sheegaysaa in Saa'uul xukunkiisa ahaa “afartan” sanadood. Sabtuujantigu waxa uu ka tegayaa dhammaanba jumladda waxaanu ku bilaabmayaa I Samuu'eel. 3:2. “Afartan” waxa uu ahaa tiro dhaqan ahaa rabbaaniyuuntu u lahaayeen.

13:22 “Waxaan ogaaday Daa'uud oo ina Yesay ah inuu yahay nin ah sida qalbigaygu doonayo” tani maaha xigasho toosa oo ka ahaatay Axdiga Hore laakiinse waxay u muuqataa inay tahay isku dhexjirka Sabuurka 89:20 iyo I Samuu'eel 13:14. Waxa loo baahan yahay in la xusuusnaado in wacdintan Bawlos ay asal ahaan raacayso tusaalaha Istefanos taariikhayntiisa ku sagan Falimaha Rasuullada 7. Daa'uudkaas waxa lagu magacaabi karaa nin ka danbeeya qalbiga Ilaah, markii uu ahaa denbiile aan caan ahayn (cf. Sabuurka. 32,51; II Samuu'eel 11), waxaanay dhiirri gelin wayn u tahay dhammaanba rumaystayaasha. Xigashadan isku dhex jirtaa waxa ay tusinaysaa waxyaalo dhowra.

1. Tani waxa ay ahayd mid ay isticmaalaan rabbaaniyiintu, waxaanay sharraxaysaa xigashooyin badan oo Axdiga Hore ah oo ku sagan Axdiga Cusub dhexdiisa isla markaana aan ahayn caadi.
2. Waxa ay qayb ka ahayd sharciyada Masiixiyiinta. Bawlos badanaa waxa uu wax kasoo xiganayaa qasiidooyinkii ugu horreeyay Masiixiyiintii iyo waxa suurto gala qoraallada kale.
3. Xigashadani waxay gaar u tahay Bawlos waxaanay tusinaysaa in Luukos inuu soo koobitaankiisa ka helay farriintan ugu horraysay ee diiwaan gashan ee Bawlos kuna sagan Falimaha Rasuullada iyadoo ka ahaatay isaga laftiisa.

▣

NASB, NKJV	“oo samayn doona waxaan doonayo oo dhan”
NRSV	“kaasoo qaadan doona doonistayda oodhan”
TEV	“oo samayn doona waxa aan ka rabo oo dhan”
NJB	“oo samayn doona doonistayda oo dhan”

Ayaddani waxa weeyi hadal maldahan oo isku dhex jira oo ah Axdiga Hore. Qaybtan ka mida jumladu maaha mid ku sagan Axdiga Hore. Axdiga Hore dhexdiisa macnihiisa Saa'uul waxa uu ahaa mid aan addeecis lahayn oo diiday. Laakiin nolosha Daa'uud sidoo kale waxa ay leedahay addeecis darro. Ilaah waxa uu ku shaqeeyaa aadanaha aan wanaagoodu buuxin si uu u dhammays tiro qorshihiisa ku waajahan cafiska.

13:23 tani waxay la simantahay Fal 7:52. Waxa ay dib u tilmaamaysaa ballan qaadyadii Axdiga Hore.

1. badbaadada ku imanaysa faraca naagta, Bilowgii, 3:15

2. xaakin ka ahaaday Yahuuda, Bilowgii. 49:10
3. hoggaamiye imanaya oo la mida Muuse, Nebiga, Sharciga Kunoqoshiisa. 18:15,18
4. hoggaamiye ka ahaaday Daa'uud, II Samuu'eel. 7; Sabuurka. 132:11; I Samuu'eel. 11:1,10; Matayos. 1:1
5. adeegaha silcaya, Ishacyaah. 52:13-53:12
6. badbaadiye, Luukos 2:11; Matayos. 1:21; Yooxanaa 1:29; 4:42; Fal 5:31

Luukos waxa uu uga socdaa #4 (cf. Luukos 1:32,69; 2:4; 3:31; Fal 2:29-31; 13:22-23). Masiixu waxa uu noqon doonaa laynka Yesay (cf. Ishacyaah. 9:7; 11:1,10; 16:5).

13:24 adeeggii Yooxanaa Baabtiisuha iyo farriintiisa waxa lagu sheegay Markos 1:1-8; Matayos. 3:1-11; Luukos 3:2-17; Yooxanaa 1:6-8,19-28. Yooxanaa waxa uu dhammaystiray waxsii sheegista Matayos 3:1; 4:5-6. Wacdintiisa ahayd towbad keenitaanku sidoo kale waxa ay tusaale u dejisay wacdintii ugu horraysay ee Ciise (cf. Matayos. 4:17; Markos 1:14-15).

Yooxanaa waxa uu ka hadlayaa Kan Imanaya, oo isaga ka wayn (cf. Matayos. 3:11; Markos 1:7; Luukos 3:16; Yooxanaa 1:27,30; Fal 13:25).

13:25 “Oo intii Yooxanaa shuulkiisa dhammaynayay” Ilaah waxa uu Yooxanaa ka lahaa inuu qabto shaqo gaar ah. Yooxanaa adeegsiisii waxa uu soconayay oo keliya siddeed iyo toban bilood. Laakiin waxa uu ahaa sanad layaab leh oo ahaa diyaar garaynta Masiixa. Bawlos waxa uu Axdiga Hore bartay markii uu yaraa isagoo ku bartay kuna tababar qaatay rabbaaniyiinta dugsigooda sheekhiisuna ahaa Gamali'eel Yerusaaalem dhexdeeda. Waxa uu injiilka ka maqlay

1. Istefanos
2. rumaystayaashii uu silcin jiray
3. isu muujin gaara oo ka ahaatay Ciise
4. Yuhuuddii rumaysadka lahayd ee joogay Dimishiq
5. Ciise Cabarbiya dhexdeeda
6. markii uu la booqday Rasuullo kale.

Waxa uu isku dayayaa inuu Ciise wax ku saabsan ka hadlo markasta oo uu awoodo. Halkanna waxa injiilka kagasoo xiganayaa waxyaalaha ku saabsan noloshiisa.

NASB (UPDATED) TEXT: 13:26-41

²⁶Walaalayaalow, idinkoo ah farcankii Ibraahim iyo kuwa idinku dhex jira oo Ilaah ka cabsadow, innaga ayaa laynoo soo diray hadalka badbaadintan. ²⁷Waayo, kuwii Yerusaaalem joogay iyo taliyayaashoodii waa garan waayeen isaga iyo codadkii nebiyada oo sabti walba la akhriyi jiray, sidaas daraaddeed ayay waxyaalihii dhammeeyeen markay xukumeen isagii. ²⁸Oo in kastoo ayan ka helin sabab lagu dilo, ayay w axay Bilaatos weydiisteen in la dilo. ²⁹Oo markay dhammeeyeen waxyaalihii laga qoray oo dhan, ayay geedkii ka soo dejiyeen oo xabaal geliyeen ³⁰laakiin Ilaah baa ka sara kiciyey kuwii dhintay, ³¹oo maalmo badan waxaa isagii arkay kuwii kala yimid Galili ilaa Yerusaaalem kuwaasoo hadda ah markaati furayaashiisii xagga dadka. ³²Oo waxaannu idin keenaynaa war wanaagsan oo ku saabsan ballankii awowayaasheen loo ballan qaaday, ³³oo ah sidii Ilaah ballankaas ugu oofiyey carruurteenna markuu Ciise sara kiciyey, sida ay Sabuurka labaadna ugu qoran tahay. Waxaad tahay Wiilkayga, maantaan ku dhalay. ³⁴Isagii buu ka sara kiciyey kuwii dhintay inuusan mar dambe qudhun ku noqon, sidaas daraaddeed ayuu sidan ku hadlay, isagoo leh, Waxaan idin siin doonaa barakooyinka runta ah oo Daa'uud loo ballan qaaday. ³⁵Saas aawadeed wuxuu Sabuur kale ku yidhi, Kaaga qoduuska ah uma oggolaan doontid inuu qudhmo. ³⁶Maxaa yeelay, Daa'uud markuu qarnigiisa ugu shaqeeyey talada Ilaah dabadeed ayuu dhintay, waana lala xabaalay awowayaashiis, wuuna qudhmay; ³⁷laakiin kii Ilaah sara kiciyey, ma uu qudhmin. ³⁸Sidaas darteed, walaalayaalow, garta in ninkan xaggiisa dembidhaafka laydinkaga wacdiyey; ³⁹nin kasta oo isaga rumaystana xaq baa lagaga dhigay wax walba oo sharciga Muuse uusan xaq idinkaga dhigi karin. ⁴⁰Sidaas darteed iska jira inaanay idinku dhicin wixii nebiyadu sheegeen iyagoo leh, ⁴¹Bal eega, kuwiinan wax quudhsadow, yaaba oo luma; Waayo, maalmihiinnii waxaan samaynayaa shuqul, Oo ah shuqul aydnaan rumaysan doonin. haddii laydiin sheego.

13:26 “idinkoo ah farcankii Ibraahim iyo kuwa idinku dhex jira oo Ilaah ka cabsadow” Tani waxa ay sheegaysaa dhegaystayaashii Yuhuudda (ama kuwii qaatay diinta Yuhuudda) iyo kuwii aan ahayn Yuhuudda (kuwa Ilaah ka cabsada) ee ku xidhnaa tawxiidnimada diinta Yuhuudda.

▣ **“badbaadintan.”** Waxa ay middani sheegaysaa ballan qaadka Ilaah ee ah badbaadinta aadanaha leexday isaga oo ku badbaadin doona Masiixa (Bilowgii 3:15). Waxa ay koobsanaysaa kuwa aan ahayn Yuhuudda (cf. Bilowgii. 12:5; Baxniintii. 19:5-6; iyo Fal 28:28 iyo 13:46).

13:27 aayaddani sida ay sheegaysaa waa mid laga xumaado. Waxa ay soo koobaysaa indho la'aanta Yuhuuddii joogtay Yerusaaalem iyaga oo ka indho la'aa inkasta oo si joogto ah ay u akhriyi jireen. waayitaanka calaamadaha nebiyada (cf. Sabuurka 22; Ishacyaah 53; Sekeryaah; Malaakii) iyo waxsii sheegista (Ishacyaah, Yoonis) waxay noqdeen calaamadaha nebiyada! Kuwiisa ayuu u yimid laakiin kuwiisii may aqbalin (cf. Yooxanaa 1:11-12).

13:28 Falimaha Rasuulladu marar badan ayuu sheegayaa masuuliyadda ruuxi ahaaneed ee Yuhiiddii ku sugnaa Yerusaaalem (cf. 2:23,36; 3:13-15; 4:10; 5:30; 7:52; 10:39; 13:27-28).

13:29 “iyagu..iyagu” tani waxa ay sheegaysaa kooxo kala duwan. Kuwa hore waxay ahaayeen kuwii rabay dhimashadiisa (hoggaankii Yuhuudda, dadkii badnaa ee horjoogay Bilatos). Kuwa labaadna waxa weeyi kuwii aasitaanka habboona. Waxay ay middani koobsan kartaa Yuhuuddii daacadda ahayd ee arkayay caddaalad darrada (waxay la mid tahay Fal 8:2, iyadoo koobsanaysa aasitaankii Istefanos) ama xertii qarsoonayd sida Yuusufkii reer Arimatiya iyo Nikodemos (cf. Yooxanaa 19:38-42).

▣ **“waxyaalihii laga qoray oo dhan”** Ciise noloshiisu waxa ay ka mid ahayd waxsii sheegid la dhammays tiray. Caddayn xooggan oo ah waxyiga Kitaabka iyo Ciise oo ah Masiixa waxa ay ahayd waxsii sheegis lasii sheegay (cf. Luukos 22:22; Fal 2:23; 3:18; 4:28; 10:43; 13:29; 24:14; 26:22).

Waxa hubaala oo run ah in faahfaahin badan oo ku saabsan Ciise noloshiisa, taasi oo maanta lagu magacaabo waxsii sheegis, ay yihiin kuwo isu eeg. Dhacdooyin badan waxay ka dhaceen nolsoha Israa'iil taasi oo mardanbe u muuqata inay kusoo aroortay nolosha Ciise (tusaale ka mida, Hoosheeca 11:1). Badanaa aayado badan ayaan laga fahmin iyadoo ah waxsii sheegis, waxay u muuqataa inay u boodayso mid ka mida aragtiyaha khibradihii Ciise ee dhulka dushiisa (ex. Sabuurka 22; Ishacyaah 53). Waxa ay qaadansaa ilhaamin iyo macnaha la xidhiidha taariikhda badbaadada oo si buuxda u sheegaysa Axdiga Hore oo ka hadlayay Ciise. Waxaan sidoo kale raacinayaa inkastoo qoraayada Axdiga Cusub ee loo waxyooday adeegsadeen isu ekaysiinta, xitaa maldahaadda, in barayaasha casriga ah iyo wacdiyayaasha aanay adeegsanin fasiraadda qaabkan ah! eeg fasiraadda Bob ee ku sugan www.freebiblecommentary.org

▣ **“geedkii”** eeg fiirada 5:30 iyo 10:29.

13:30,33,34,37 “laakiin Ilaah baa ka sara kiciyey kuwii dhintay” Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa in dhammaanba saddexda shakhsi ee Saddexmidnimadu ay ku lug lahaayeen sarakicista Ciise:

1. Ruuxa (cf. Rooma. 8:11)
2. Wiilka (cf. Yooxanaa 2:19-22; 10:17-18)
3. Aabbaha (cf. Fal 2:24,32; 3:15,26; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30,33,34,37; 17:31; Rooma. 6:4,9; 10:9; I Korintos. 6:14; II Korintos. 4:14; Galatiya. 1:1; Efesos. 1:20; Kolosay. 2:12; I Tesaloniika. 1:10).

Tani waxay ahayd Aabbaha oo ansixiyay runta ku jirta nolosha Ciise iyo waxbaristiisa. Waxay middani ahayd dhinaca ugu wayn ee *Kerygma* (i.e., waxyaalaha ay koobsanayaan wacdimaha ku sugan Falimaha Rasuulladu). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14.

13:31 “oo maalmo badan” Fal 1:3 waxa ay sheegaysaa “afartan maalmood.” Si kastaba ha ahaatee, afartanku waxa weeyi tiro guud ahaaneed oo ku sugan Axdiga Hore. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3.

▣ **“waxaa isagii arkay”** Eeg Mawduuca Gaarka ah: Muuqashooyinkii Ciise ee sarakicista dabadeed 1:3

13:32 “ballankii awowayaasheen loo ballan qaaday” middani waxa ay sheegaysaa ballankii ugu horreeyay ee YHWH uu siiyay Ibraahim oo ku saabsan farcan iyo dhul (cf. Bilowgii. 12:1-3; Rooma 4). Ballan qaadkan oo kale oo ah joogitaanka Ilaah iyo barakadiisa ayaa loogusoo celceliyay Wadaaddada iyo carruurtooda (cf. Ishacyaah. 44:3; 54:13; Yoo’eel 2:32). Axdiga Hore waxa uu diiradda saarayaa dhulka, halka Axdiga Cusubina uu diiradda ka saarayo “farcanka.” Bawlos waxa uu ballan qaadkan ku sheegayaa Rooma 1:2-3.

13:33 xigashadani waxay ka ahaatay Sabuurka 2:7, kaasi oo ah sabuur boqortooyo oo la xidhiidha masiixa kuna saabsan khilaafka iyo guusha Masiixa Ilaah ee la ballan qaaday. Ciise waxa lagu dilay shar (aadanaha iyo jinka), laakiin Ilaah ayaa sarakiciyay si uu u guulaysto (Rooma 1:4).

Aayaddan iyo Rooma 1:4 waxa adeegsaday bidcoolayaashii ugu horreeyay si ay usheegaan in Ciise uu noqday Masiixa markii uu sarakacay. Waxa hubaashii jira xoojin Axdiga Cusub ah oo ku saabsan Ciise ammaanmay taasina ay ku timid addeecitaankiisa, laakiin tan waa in aan loo qaadanin isaga oo ka faquuqan jiritaankiisa hore iyo Ilaahnimadiisa (cf. Yooxanaa 1:1-5,9-18; Filiboy. 2:6-11; Kolosay. 1:13-18; Cibraaniyada. 1:2-3).

Falkan oo kale “sarakiciyay” (*anistēmi*), waxa lagu adeegsaday Fal 3:26 Ilaah oo sarakiciyay “Midiidinkiisa”; sida ku sugan 3:22 Ilaah oo nebiga sarakiciyay (cf. 7:37; Sharciga Kunowoshadiisa. 18:19). Waxay tani u muuqataa inay tahay isticmaal ka duwan “ka sarakiciyay” kuwa dhintay (cf. aayadaha. 30,34,37). Ciise waxa la “sarakiciyay” kahor intaanu dhimanin!

13:34 “inuusan mar dambe qudhun ku noqon” odhaahdani waxa ay sheegaysaa Ciise dhimashadiisa iyo sarakicistiisa. Waxa uu ahaa kan ugu horreeya ee la sarakiciyay (midhaha ugu horreeya ee kuwa dhintay, I Korintos 15:20) iyadoon ahayn in loo soo celiyay neefta oo keliya. Dad badan ayaa jidh ahaan dib loo soo nooleeyay sida ku sugan Kitaabka, laakiin dhammaantood dib ayay markale u dhimanayeen. Enoch iyo Eliyaas waxa kor loogu qaaday samada iyagoon dhimanin, laakiin lama sara kicinin.

▣ **“Waxaan idin siin doonaa barakooyinka runta ah oo Daa'uud loo ballan qaaday”** tani waa xigasho ka ahaatay Ishacyaah. 55:3 ee LXX ka. Xigashadu waxa ay koobsanaysaa jamaca “barakooyinka runta ah,” laakiin si gaara uuma sheegayso waxa ay tilmaamayso. Waxa weeyi wax Ilaah uuga yimid Daa’uud, kaddibna Ciise, kaddibna kuwa isaga raaca ee xertiisa ah (jamaca “idinku” waxa uu ku jiraa xigashada). Macnaha ka muuqanaya Axdiga Hore waxa uu tusinayaa muhiimadda ku jirta “idinku” (cf. Ishacyaah. 55:4-5 LXX, “Daya, isaga waxa aan markhaati uga dhigay kuwa aan ahayn Yuhuudda, waxaanu amiir iyo taliye u yahay kuwa aan ahayn Yuhuudda. Quruumaha aan ku aqoonin, adigay kuu iman doonaan, adigay kuu baaqi doonaan, dadyowga aan ku aqoonina, adigay kuusoo qaxi doonaan, Ilaaha Rabbiga ah dartiis, Kan Quduuska ah ee Israa’iil, oo isagu wuu ku ammaani doonaa,” Sabtuujantiga, Zondervan, 1976, p. 890).

Ballan qaadyada iyo barakada la siiyay Daa’uud (Yuhuud) imika waxa ay yihiin ballan qaadyada kuwa aan ahayn Yuhuudda (cirqiga aadanaha oo dhan).

13:35-37 tani waxay la mid tahay doodda xagga hore lagusoo sheegay ee ahayd wacdintii Butros ee maalintii Bentakostiga (cf. 2:24-32), sidoo kalena waxa lagasoo qaatay Sabuurka 16. Wacdimahana hore ee ku sugan Falimaha Rasuulladu waxa ay ka tarjumayaan qaabkii Masiixiyiintii ugu horreeyay. Qoraallo dhowra oo ah Axdiga Hore kuna saabsan Masiixa ayaa la isu keenay oo la isku xoojiyay. Haddaba, badanaa magac u yaallada iyo faahfaahinta uma muuqato inay la xidhiidho ujeeddada gudndhigga ah ee qoraaga Axdiga Cusub, taasi oo ah caddaynta ama xoojinta sarakicinta jidh ahaaneed ee Ciise iyo jidhka Daa’uud oo hallaabay.

13:38 Bawlos waxa uu adeegsanayaa waxyaalaha ku sugan Axdiga Hore, sidii Butros oo kale (Fal 2) iyo Istefanos (Fal 7) si uu u gaadho dhegaystayaashan sunagoga. Bawlos waxa uu ballan qaadayaa cafiska buuxa ee denbiyada, taasi oo ah midaan laga heli karin diinta Yuhuudda (aayadda 39), kaasi oo u ahaaday dhammaanba kuwa isku halleeya Ciise oo ah Masiixa (“Kan” aayadaha 38, 39).

13:39 “nin kasta oo isaga” fiiro u yeelo arrinta caalamiga ah. Ilaah waxa uu jecelyahay aadanaha oo dhan dhammaan aadanahuna waxay haystaan jaaniska ay isaga rumaysadka ugu jawaabi karaan (cf. 10:43; Ishacyaah. 42:1,4,6,10-12; 55; Yexesqeel. 18:23,32; Yoo’eel 2:28,32; Yooxanaa 3:16; 4:42; Rooma. 3:22,29,30; 10:9-13; I Timoteyos. 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; II Butros 3:9; I Yooxanaa 2:1; 4:14).

▣ **“rumaysta”** Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:16 iyo 6:5.

▣

NASB, NKJV

“xaq baa lagaga dhigay wax walba” (aayadda. 39)

NRSV

“denbiyadaas oo dhan waa laga xoreeyay” (aayadda. 39)

TEV

“denbiyadoo dhan waa laga cafiyay” (aayadda. 39)

NJB

“xaqbaa laga dhigay inuu denbiyada xor ka yahay” (aayadda. 38)

Tani waxay ka dhigantahay “xaqbaa laga dhigay” (fal wax tilmaamaya oo mafcuulku soo horreeyo). Waa erey sharciga loo adeegsado isaga oo tilmaamaya halka aan ka taaganahay Ilaah inaga oo usii marayna xaqnimada Ciise Masiix (cf. II Korintos. 5:21). Xagga Cibraaniga asal ahaan waxa loogala jeedaa “dhirta ka ag baxda webiga” (eeg Mawduuca Gaarka ah 3:14). Waxa ay ka tarjumaysaa erey Axdiga Hore ah oo lagu shabahay Ilaah oo ah xaakinka uu ku samaysanyahay xukunka.

▣ **“oo sharciga Muuse uusan xaq idinkaga dhigi karin.”** Tani waxay ahayd midda ugu muhiimsan ee fiqi ahaan Bawlos u socday (cf. Rooma. 3:21-30). Sharciga Muuse waxa uu ahaa mid inaga caawinaya sida aan ku fahano denbiga shakhsi ahaaneed iyo inuu inagu sababo inaan doonno Masiixa (cf. Galatiya. 3:23-29). Sharciga Axdiga Hore maaha mid keenaya badbaado, waayo dhammaan waa lawada denbaabay (cf. Rooma. 3:9-18,23; Galatiya. 3:22). Waxa uu noqday xukun dhimasho ah iyo inkaar (cf. Galatiya. 3:13; Kolosay. 2:14).

MAWDUUC GAAR AH: ARAGTIYADII BAWLOS EE SHARCIGII MUUSE

Waa wax wanaagsan oo ka yimid Ilaah (cf. Rooma 7:12,16)

- A. Ma aha jidka xaqnimada iyo aqbalitaanka Ilaah (oo waxa uu xitaa noqon karaa habaar, cf. Galatiya 3)
- B. Weli waa Ilaah doonistiisa u ahaatay rumaystayaasha maxaa yeelay isagu waa Ilaah Is-muujintiisa (Bawlos waxa uu had iyo gooraale u soo xigtaa Axdigii hore in uu u muujiyo oo/ama ku dhiirri geliyo rumaystayaasha)
- C. Rumaystayaasha waxaa lagu war geliyey Axdigii Hore (cf. Rooma 4:23-24; 15:4; I Korintos 10:6,11), laakiin Axdigii Hore kuma aysaqn badbaadin (cf. Falimaha Rasuullada 15; Rooma 4; Galatiya 3; Cibraaniyada)
- D. Waxa uu ka dhex shaqeeyaa Axdiga Cusub si uu
 1. 1.Ugu muujiyo Dembi badnaabta (cf. Galatiya 3:15-29)
 2. 2.Ugu hago madax furashada aadanaha ee bulshada dhexdeeda ah
 3. 3.Ugu war geliyo Masiixiga go’aannadiisa asalka ah

Tani waa shucaaca fiqi ahaaneed ee ka imanaysa inkaarta iyo dhimashada eek u aaddan barakada iyo joogtaynta ee dhibaata ku sababaysa isku dayga in la fahmo Bawlos aragtidiisa ku aaddan Sharcigii Muuse. Sida ku jirta *A Man in Christ*, James Stewart waxa uu muujinayaa Bawlos fikirkiisii iyo qoraalkiisii is waafaqsanaa:

“Sida caadiga ah waxa aad fili lahayd nin isagu shaqsi ahaantiisa habaynayey in uu dhiso hab fikir iyo fiqi ah si uu si hadba dhan loo qaadan kaor ee macquulka ah ugu saleeyo ereyadii uu ku shaqeeyay. Waxa aad ka fili lahayd to in ujeedkiisu yahay saxnaanta barashada weedhaha fikirka uu hoggaaminayo. Belaakiin waxa aad weyddiin lahayd in erey, uu mar qoraagaagu u isticmaalay dareen gaar ah, uu waddada dareenkaas ku socon lahaa. Laakiin bal middan ka raadi Bawlos waa mid laga niyad jabo. Weedhihiisa badankood waa kuwo waddooyin badan qaadi kara, ma aha kuwo aan meelna u leexanayn. . . “Sharcigu waa qudduus” wuxuu qorayaa, ‘sharciga Ilaah ayaan kaga farxaa ninka gudaha ah’ (Rooma 7:12,22), laakiin sida cad waa arrin kale oo ah nomos waxa isaga ka dhigaya in uu sheego meel kale. “Masiix wuxuu inaga furtay inkaartii sharciga (cf. Galatiya 3:13)” (Bogga 26).

13:40-41 Bawlos dhegaystayaashiisa waxa uu ugu yeedhayaa (fal wakhti xaadirka jooga oo amar ah) inay ka jawaab celiyaan iyaga oo isku hallaynaya Ciise oo ah Masiixa la ballan qaaday, taasi oo ah sida ay ku heli karaan cafiska (cf. Yooxanaa 14:6; Fal 4:12; I Timoteyos. 2:5).

Waxa uu Xabaquuq 1:5 kasoo xiganayaa Sabtuujantiga iyadoo digniin ahaan. Meelo kale oo ah qoraallada Bawlos waxa uu kusoo xiganayaa Xabaquuq 2:4 iyadoo ah jawaab celin habboona (cf. Rooma. 1:17; Galatiya. 3:11). Bawlos waxa uu u wacdinayaa go'aan dartiis. Waafiqitaanka caqli ahaaneed maaha intaasoo keliya; laakiin waa iyadoo shakhsi ahaan la isu dhiibo Ciise isagoo ah rajada loo baahida qabo. Rumaysadkan ugu horreeya iyo towbad keenku waxa weeyi inuu maalin walba ka muuqdo nolosha ku dhisan lamidnimada Masiixa. aayadda 41 waxa ay sheegaysaa qaabka cusub ee layaabka leh isla markaasna ah ka badbaadada lagu helayo oo ah axdiga cusub ee ku sugan Masiixa.

NASB (UPDATED) TEXT: 13:42-43

⁴²Kolkay baxayeen, dadkii waxay ka baryeen inay hadalladaas sabbtida dambe kula hadlaan.
⁴³Haddaba markii sunagogga laga tegey, kuwa badan oo Yuhuud ah iyo kuwa cibaadaysan oo Yuhuudda raacsan ayaa waxay raaceen Bawlos iyo Barnabas, kuwaas oo la hadlayay iyaga oo ku adkeeyey inay nimcada Ilaah kuu sii wadaan.

13:42 Tani waxay tusinaysaa awoodda Ruuxa (1) oo isticmaalaya wacdinta Bawlos iyo (2) baahida loo qabo cafiska iyo aadanaha oo dib ula heshiia Ilaah ka abuuray iyaga ekaanshihiisa.

13:43

NASB “kuwa cibaadaysan oo Yuhuudda raacsan”
NKJV “Yuhuudda raacsan cibaadana leh”
NRSV “kuwo cibaado leh oo ku biiray diinta Yuhuudda”
TEV “kuwii aan Yuhuudda ahayn balse ku biiray diinta Yuhuudda”
NJB “kuwo cibaado leh oo galay diinta Yuhuudda”

Weedhan waxa loogala jeedaa “kuwo cibaadaysanaya oo diinta Yuhuudda ku biiray.” Tani waa koox ka gaar ah “kuwo Ilaah ka cabsi leh” sida ku sugan aayadaha 16,26 (cf. 10:2,22,35).

Aayadda 43 ayaa waxay sheegaysaa kuwa aan Yuhuudda ahayn ee sida rasmiga ah u noqday Yuhuudda. Middana waxa looga baahna

1. baabtiis iyada oo markhaatiyaal joogaan
2. gudniinka ragga
3. bixinta qurbaanka la siinayo Macbadka haddii ay suurto gal tahay

Waxa jira maraajic yar oo tusinaya Axdiga Cusub dhexdiisa kuwii ku biiray diinta Yuhuudda (cf. Matayos. 23;15; Fal 2:11; 6:5; 3:43).

☐ **“oo ku adkeeyey inay nimcada Ilaah kuu sii wadaan”** sida macnaha guud ka muuqata waxa adag in la qeexo weedhan.

1. waxa laga yaabaa dhegaystayaashan qaarkood inay horeba qalbiyadooda ugaga jawaab celiyeen injiilka kuwii ku kalsoonaa waxay fahmeen ee ahaa nimcada Ilaah ee ku sugan Axdiga Hore waxa lagu adkeeyay inay sii wadaan raadinta Ilaah oo markalena ay dhegaystaan Bawlos (cf. aayadda. 44).

NASB (UPDATED) TEXT: 13:44-47

⁴⁴Sabtida dambe ayaa magaaladii oo dhan in yar mooyaane isugu timid inay maqasho hadalka Ilaah. ⁴⁵Laakiin Yuhuuddu markay arkeen dadkii faraha badnaa, waxaa iyaga ka buuxsamay masayr, wayna beeneeyeen waxyaalihii Bawlos ku hadlay, waana caayeen ⁴⁶Haddaba Bawlos iyo Barnabas ayaa geesinimo ku hadlay iyagoo leh, Waxay ahayd lagama maarmaan in hadalka Ilaah markii hore idinka laydinkula hadlo. Laakiin idinku waad diiddeen, oo waxaad isku xukunteen sidii kuwo aan istaahilin nolosha weligeed ah, oo bal eega, sidaas aawadeed waxaannu u jeesanaynaa dadka aan Yuhuudda ahayn. ⁴⁷Maxaa yeelay, sidaasaa Rabbigu nagu amray isagoo leh, Waxaan kaa dhigi doonaa iftiinka quruumaha, Inaad badbaadinta u noqotid ilaa meeshii dunida ugu fog.

13:44 farriinta Bawlos waxay lahayd saamayn muuqata. cid wal oo magaalada joogtana macneheedu maaha inay kasoo wada qayb galeen.



NASB, NRSV,

TEV

“hadalka Rabbiga”

NKJV, NJB,

REB

“hadalka Ilaah”

Waxa jira kala duwanaansho dhinaca qoraal gacmeedyada Giriigga ah oo ku saabsan meeshan.

1. Rabbi waxay ku sugantahay MSS P⁷⁴, a, A, B²

2. Ilaah waxay ku sugantahay MSS B, C, E

UBS⁴ ku waxa uu dhigayaa “Rabbi” laakiin waxa uu kusoo aroorinayaa “C” (adayg). Sida kala duwanaansho badan oo kale, ayaa middani waxa ay tahay mid aan wax saamayna ku yeelanaynin qoraalka. Injiilku waa waxyi Ilaahi ah oo ku saabsan Ciise oo ah Masiixa.

13:45 “Yuhuuddu markay arkeen dadkii faraha badnaa..masayr” haddii ay ahayd dad badan oo baxay ama tiro badan oo ah kuwo aan Yuhuud ahayn oo dadkan badan ah ee sababay masayrku macnaha waa mid aan lagu hubin. Masayrka waxa lagu tilmaamay hoggaankii Yuhuudda iyo marka la isku daro kuwii joogay Yerususalem iyo kuwii kale ee ahaa Qurbo joogga (cf. Matayos. 27:18; Markos 15:10; Fal 17:5).

Mar danbe ayaa kitaabka Rooma Bawlos waxa uu kaga hadlayaa dhibka fiqi ahaaneed ee Yuhuudii aan rumaysadka lahayn (cf. Rooma 9-11). Waxa uu sheegayaa in Ilaah si ku meel gaadha ah u indho tiray si kuwa aan Yuhuudda ahayni u badbaadaan. Si kastabaha ha ahaatee, Ilaah waxa uu badbaadada kuwa aan Yuhuudda ahayn u adeegsanayaa macno (masayr) si uu Israa’iliyiinta ugu sababo inay rumaystaan Masiixa, sidaas darteedna rumaystayaasha oo dhami waxa ay ku midoobi doonaan injiilka (cf. Efesos. 2:11-3:13).

Dhibaataadu waxa weeyi goorma ayaa middani soo arooraysaa? Su’aasha la midka ah waxa la iska waydiin karaa Sekeryaah. 12:10. Waxsii sheegiddani ma waxay la xidhiidhaa kaniisaddii ugu horraysay, taasi oo ku dhisnayd Yuhuuddii rumaysadka lahayd ama wakhti mustaqbal ah? hinaasaha waxa loogala jeedaa ujeedo cafis ah (cf. Rooma. 10:19; 11:11,14), laakiin masayrka halkan ka muuqdaa waxa uu sababayaa rumaysad darro!

▣ “waxaa iyaga ka buuxsamay masayr” eeg fiirada 3:10.

▣ “waana caayeen” iyagoo Yuhuuddani difaacaya dhaqankooda isla markaana weeraray Bawlos wacdintiisa, iyaga laftooda ayaa gelay denbi caytamis ah. Ma jiro wax intan ka sokeeye. Mid ahaan diinta Yuhuudda ama Masiixiyadda ayaa ah mid ka tarjmaysa doonista Ilaah ee runta ah. Iyagu waa khaas!

13:46 “geesinimo ku hadlay” tani waa mid ka mida calaamada ku sugan Falimaha Rasuullada ee ah ka buuxsamitaanka Ruuxa.

▣ “Waxay ahayd lagama maarmaan in hadalka Ilaah markii hore idinka laydinkula hadlo” tani waxa ay ahayd tusaalaha wacdintii adeegayaashii ugu horreeyay. Yuhuuddu muhiimadda koobaad ayay lahaayeen (Rooma

9-11), laakiin Ilaah waxa uu kusoo daray kuwa aan ahayn Yuhuudda. Kuwii ku sugnaa sunagogu waxay barteen Axdigooda Hore waxaanay eegi karayeen waxsii sheegyada. Falimaha Rasuulladu waxa uu dhigayaa qoraallo taxane ah oo ku saabsan fikirkan iyo tusaalahan (cf. 3:26; 9:20; 13:5,14; 16:13; 17:2,10,17).

▣ **“waad diideen”** kani waa fal xooggan (fal wakhti xaadirka jooga oo wax tusmaynaya) oo marar badan lagu adeegsaday Sabtuujantiga dhexdiisa. Macnihiisa asaasiga ahi waxa weeyi “ka jeesasho.” Waxa loo adeegsaday Israa’iliyiinta ku sugan wacdinta Istefanos (7:39). Sidoo kale Bawlos ayaa ku adeegsaday Rooma 11:1-2 isaga oo sheegaya in Ilaah aanu diidin dadkiisa, laakiinse ay iyagu diideen Wiilkiisa, kan ah macnaha keliya ee badbaadada, iyo muujintiisa dhammayska tiran.

▣ **“oo waxaad isku xukunteen sidii kuwo aan istaahilin nolosha weligeed ah”** waxa adag in la qaato fikirka la xidhiidha qadarka kaasoo in badan lagaga hadlay Falimaha Rasuullada kaasoo la xidhiidha ka jawaab celinta shakhsi ahaaneed. Qofna rumaysad ma yeelan karo iyadoonu Ruuxu u sawirin (cf. Yooxanaa 6:44,65), laakiin waxa la inagu xukumay haddii aan ka jawaab celino iyo haddii kaleba. Diiditaankooda ay diideen wacdinta Bawlos ee injiilka ayay ku muujiyeen nafhooda runta ah (cf. Yooxanaa 3:17-21). Canaanta ah ka jawaab celin la’aantu maaha mid Ilaah dusha laga saari karo. Waxa uu ku deeqay jid kaasi oo ah Wiilkiisa, laakiinse isaga oo keliya ahaa ah jidka. Tanina waa qarsoodiga “rumaysad darrada”!

▣ **“waxaannu u jeesanaynaa dadka aan Yuhuudda ahayn.”** tani waxa ay tusaale caadi ah u ahayd faafinta injiilka (cf. 18:6; 22:21; 26:20; 28:28; Rooma. 1:16).

13:47 tani waa xigasho ka ahaatay Sabtuujantiga Ishacyaah. 49:6 (cf. 42:6). Simoen ayaa xigashadan ugu adeegsaday barakada Ciise sida ku sugan Luukos 2:32 isaga oo sheegaya shaqadiisa la xidhiidha cafiska dunida (eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8). Xitaa waxa suurto gala in “iftiin” ka ku sugan macnuhu uu toosinayo Bawlos iyo Barnabas ku wacdintooda injiilka ee kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. “Axdiga Hore oo lagu dhex adeegsaday ka Cusub,” oo uu leeyahay Darrell Boch, p. 97 sida ku sugan *Foundations for Biblical Interpretation*, Broadman & Holman Publishers, 1994). Hadda Bawlos wuxuu u adeegsanayaa si uu u tusiyo faafinta injiilka ee caalamiga ah! Ereyada dhammaadka ah, “meeshii dunida ugu fog” waxa laga yaabaa inay si dadban ugu noqonayso 1:8. Waxa ay ka hadlaysaa caalamimada injiilka.

NASB (UPDATED) TEXT: 13:48-52

⁴⁸Haddaba markii dadkii aan Yuhuudda ahayn taas maqleen, ayay ku farxeen oo hadalkii Ilaah ammaaneen; oo waxaana rumaystay kuwii nolosha weligeed ah loo dhigay. ⁴⁹Hadalkii Rabbigana waxaa lagu faafiyey waddankii oo dhan. ⁵⁰Laakiin Yuhuuddu waxay soo kiciyeen dumarkii cibaadada iyo sharafta lahaa iyo raggii madaxda magaalada ahaa, silec bayna Bawlos iyo Barnabas ku kiciyeen, oo soohdintoodii bay ka eryeen iyagii. ⁵¹Laakiin markay siigadii cagahooda ka dhabaandhabeen, dabadeed ayay waxay yimaadeen Ikoniyon. ⁵²Xertiina waxaa ka buuxsamay farxad iyo Ruuxa Qoduska ah.

13:48 “markii dadkii aan Yuhuudda ahayn taas maqleen, ayay ku farxeen oo hadalkii Ilaah ammaaneen” Kuwo badan oo iyaga ahi waxay Sunagoga joogeen sanado badan weligoodna may maqlin farriinta caalamiga ah ee jacaylka Ilaah iyo isagoo aqbalaya aadanaha oo dhan haddii ay rumaystaan Masiixa. Markii ay middan maqleenna way aqbaleen (cf. 28:28) kuwa kalena way u gudbiyeen (aayadda 49).

▣ **“oo waxaana rumaystay kuwii nolosha weligeed ah loo dhigay”** tani waa hadal cad oo ku saabsan qadarka (waxa uu caan ku ahaa rabbaaniyiinta iyo qoraallada Yuhuudda), laakiin waxa ay la mid tahay maldahaadda aayadaha dhammaanba ku sugan Axdiga Cusub kuwaasoo la xidhiidha arrinta liddiga ku ah doorashada Ilaah iyo doonista xorta ah ee aadanaha (cf. Filiboy. 2:12, 13). Waa ereyga mafcuulku soo horreeyo ee loo adeegsado militariga (*tasso*) macneheeduna yahay “magacaabis.”

Fikirka la xidhiidha magacaabistu waxa uu tilmaamayaa labo kitaab oo shabahaad ah Ilaahna leeyahay (cf. Daanyeel. 7:10; Muujintii. 20:12). Ka hore waa kitaabka camaladda dadka (cf. Sabuurka. 56:8; 139:16; Ishacyaah. 65:6; iyo Malaakii. 3:16). Kitaabka kalena waa kitaabka nolosha (cf. Baxniintii. 32:32; Sabuurka.

69:28; Ishacyaah. 4:3; Daanyeel. 12:1; Luukos 10:20; Filiboy. 4:3; Cibraaniyada. 12:23; Muujintii. 3:5; 13:8; 17:8; 20:12-15; 21:27). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:27.

13:50 “laakiin Yuhuuddu waxay soo kiciyeen dumarkii cibaadada iyo sharafta lahaa” qoraalkani waxa uu bixinayaa heerka ay dhaqan ahaan iyo taariikh ahaan dumarkii Aasiyada Yar ee qarnigii koobaad (cf. 16:14; 17:4).

Macnaha ay halkan ugu jirtana waxa ay tilmaamaysaa dadkii kusoo biiray diinta Yuhuudda kuwaasoo sidoo kale bulshada hoggaamiyayaal ka ahaa ama qabay dumar hoggaamiyayaal ah. A. T. Robertson, ayaa *Word Pictures in the New Testament*, vol. 3, p. 201, tusinaya meesha ay dumarka aan Yuhuudda ahayni si aada uga heleen diinta Yuhuudda (cf. *Strabo* 7:2 iyo *Juvenal* 6:542) anshaxeeda aawadeed.

▣ **“silec bayna Bawlos iyo Barnabas ku kiciyeen”** Bawlos waxa uu middan ku xusayaa II Timoteyos. 3:11.

13:51 “siigadii cagahooda ka dhabaandhabeen” tani waxay calaamad u tahay diidmada Yuhuudda (cf. Matayos. 10:14; Markos 6:11; Luukos 9:5; 10:11). Waxa aan la hubin haddii middani ay ay sheegayso (1) siigada sandhalkooda ee cagahooda soo gaadhay markay soconayaan ama (2) siigada goyaashooda soo gaadhay markay shaqaynayaan.

▣ **“Ikoniyon”** waxay ahayd magaalada ugu muhiimsan Lycoaniya, iyadoo ku taallay gobolkii Roomaanka ee Galatiya. Waxa ay kudhowaad sideed mayl ka tahay koonfurta bari ee Bisidiya dii Antiyokh xagga woqooyina waxay kaga toosan tahay Laystara.

13:52 “waxaa ka buuxsamay farxad” waa fal aan dhammays tirnayn oo mafcuulku soo horreeyo waxna tusmaynaya kaasi oo loogala jeedi karo bilaabitaanka wax ama kusoo cecelinta fal bilaabmay wakhti tegay. NASB daabacaadda 1995 ayaa waxa uu u qaadanayaa macnaha labaad. Ruuxa Quduuska oo keliya ayaa farxad bixin kara silcinta illowsiin kara (cf. Rooma. 5:3; Yacquub 1:2ff; I Butros 4:12ff).

Ereyga ah “xertu” waa hadal dahsoon. Ma waxa uu tilmaamayaa rumaystayaasha cusub, kooxda adeegayaasha ah, mise labadaba?

SU’AALO FALQAYN AH.

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahaan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay tahay sababta 13:2-3 aan loogu adeegsanin caddaynta doorashada kooxda?
2. Muxuu Bawlos ugu horraynba uga wacdiyay sunagoga?
3. Muxuu Yooxanaa Markos uga tegay kooxdii adeegayaasha ahaa? (aayadda 13)
4. Sidee ayaa aayadda 39 ula xidhiidhaa Galatiya 3?
5. Sharrax aayadda 48b xidhiidhka ay la leedahay qadarka iyo doonista xorta ah ee aadanaha.

FALIMAHA RASUULLADA 14

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos iyo Barnabas oo jooga Ikoniyon 14:1-7	Ikoniyon 14:1-7	Ka adeegitaankii gobolka Ikoniyon iyo soo laabashadii 14:1-7	Ikoniyon dhexdeeda 14:1-4 14:5-7	Wacdintii Ikoniyon 14:1 14:2 14:3 14:4-7
Bawlos iyo Barnabas oo jooga Lustra 14:8-18	Sanam caabudistii Lustra 14:8-18 Dhagxintii, u baxsashadii Derbe	14:8-18	Lustra iyo Derbe dhexdeeda 14:8-13 14:14-18	Bogsiintii curyaanka 14:8-10 14:11-18 Dhammaadkii adeegga
14:19-20	14:19-20	14:19-20	14:19-20	14:19-20
Ku laabashadii Antiyokhdii Siiriya 14:21-28	Xoojinta dadkii rumaysiga yeeshay 14:21-28	14:21-23 14:24-28	Ku laabashadii Antiyokhdii Siiriya 14:21-23 14:24-26 14:27-28	14:21-23 14:24-26 14:27-28

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

Sidee adeegga Bawlos ula xidhiidhaa Galatiya?

- A. Labadan dhinac ee asalka ahi waa in si wada jira loola tacaalo maxaa yeelay labo aragtiyood oo liddi isku ah ayaa saamaynaya cidda loo qoray farrinta. Labada aragtiyoodba waa caqligal waxaanay xadaynayaan caddaynta kitaabiga ah.
- B. Labada aragtiyood
 1. Aragti dhaqameedka oo ahayd mid guud ilaa qarnigii siddeedaad.
 - a. waxa lagu magacaabay “Aragtida reer Woqooyiga Galatiya”
 - b. waxay u muuqataa in “Galatiya” ay sheegayso kuwii ahaa reer Galatiya ee woqooyiga iyo badhtamaha Turkiga (cf. I Butros. 1:1). Kuwan reer Galatiya (ereyga Giriigga ah *Keltoi* ama Latin *Gall*) kuwaasoo goobtan kusoo duulay qarnigii saddexaad C.D. waxa lagu magacaabi jiray “Gallo-reer Grasiya” si looga sooco walaalhooda Yurubiyaanka ah ee reer galbeedka. Waxa la jebiyay 230 C.H. iyadoo uu kusoo duulay Attalus I, oo ahaa Boqorkii Bergamum. Saamayntooda juquraafi ahaaneed waxay u xaddidnayd woqooyiga badhtamaha Aasiyada Yar ama Turkiga casriga ah.
 - c. haddii kooxdan loo arko, markaa taariikhdu waxay noqonaysaa 50 kii oo ah wakhtigii Bawlos adeegsiisii Labaad ama saddexaad. Bawlos kuwa la socday waxay noqonayaan Silas iyo Timoteyos.
 - d. Qaar ayaa la xidhiidhiyay xanuunsashadii Bawlos sida ku sugan Galatiya 4:13 isaga oo kaneeco ay ku dhacday. Waxa ay sheegeen in Bawlos uu tegay woqooyiga si uu dhibkan kanecada uga baxo iyo dhulka hoose ee xeebta.
 2. Aragtida labaad waxa geesi ka ah Sir Wm. M. Ramsay, *St. Paul the Traveler and Roman Citizen*, New York: G. P. Putnam’s Sons, 1896.
 - a. Aragti dhaqameedka lagu sheegay “Galatiya” iyadoo la xidhiidha qabiil, waxa ay aragtidani sheegaysaa maamul. Waxay u muuqataa in Bawlos uu badanaa adeegsaday magacyada gobollada Roomaanka (cf. I Korintos. 16:19; II Korintos. 1:1; 8:1, iwm.) gobolkii Roomaanka ee “Galatiya” waxa uu koobsanayaa dhul ka wayn qabiil ah “Galatiya,” markaasna waxa suurto gal ah in Bawlos socdaalkii adeegsiisa ugu horreeyay ee magaalooyinkan koonfurta Antiyokh ee Bisidiya, Lustra, Derve iyo Ikoniyon ee lagu diiwaan geliyay Fal 13-14, ay tahay meelihii ay ku yaalleen kaniisaduhu.
 - b. Haddii middan loo maleeyo “Aragtida reer Koonfurka,” taariikhdu waxay noqonaysaa mid hore, laakiin “Guddiga Yerusaaalem” ee Fal 15, kaasi oo sheegaya isla mawduucan waxa uu ka dhigayaa sida Galatiya oo kale. Guddigu waxa uu soo arooray C.D 48-49 waraaqdana waxa la qoray isla wakhtigaas dhexdiisa. Haddii tani ay run tahay, Galatiya waxa weeyi warqadda ugu horraysa ee Bawlos uu ku qoray Axdigeenna Cusub.
 - c. Kuwo ka mida caddaymaha aragtida reer koonfurka Galatiya
 - (1) Lama sheegin magacyada kuwii la socdaalayey Bawlos, laakiin Barnabas ayaa saddex jeer la sheegay (cf. 2:1,9,13). Tani waa socdaalkii adeeg ee ugu horreeyay Bawlos.
 - (2) Waxa la sheegay in Tiitos uu ahaa midaan lagudin (cf. 2:1-5). Tanina waxay ku habbontahay oo waafaqaysaa Guddigii Yerusaaalem ee Fal 15.
 - (3) Sheegitaanka Butros (cf. 2:11-14) iyo dhibaataada weheshiga kuwa aan Yuhuudda ahayni waxay waafaqaysaa Guddigii Yerusaaalem.

- (4) Markii lacagta loo qaaday Yerusaaalem waxa la diiwaan geliyay kuwo dhowra oo ka socda meelo kala duwan (cf. Fal 20:4) lana socday Bawlos. Midkoodna sida ay doontaba ha ahaatee, laguma diiwaan gelinin inuu ka socdo woqooyiga Galatiya magaalooyinkeeda inkastoo aan ogsoonahay in kuwani Galatiyanka ahi ay ka qayb qaateen kaniisadaha (cf. I Korintos. 16:1).

Hadallo kala duwan oo khuseeya doodda aragtiyahan, waxa aad kala tashataa tafsiirrada. Mid kastaa waxa uu dhigayaa waxyaalo jira. Halkanna ma jiro iswaafiqitaan, laakiin “Aragtida reer Koonfurka” ayaa u muuqata inay tahay midda ku habboon xaqiiqada.

C. Xidhiidha ay reer Galatiya la leeyihiin Falimaha Rasuullada

1. Bawlos waxa uu Yerusaaalem booqday shan jeer, waxaana taas kitaabka Falimaha Rasuullada ku diiwaan geliyay Luukos
 - a. 9:26-30, kaddib rumaysi yeelashadiisii
 - b. 11:30; 12:25, si uu u keeno gargaar ka socda kaniisadaha kuwa aan ahayn Yuhuudda
 - c. 15:1-30, Guddiga Yerusaaalem
 - d. 18:22, booqasho gaaban
 - e. 21:15ff., sharraxaad kale oo ah adeegga kuwa aan Yuhuudda ahayn
2. Waxa jirta labo booqasho oo lagu xusay Galatiya
 - a. 1:18, saddex sano dabadood
 - b. 2:1, afar sano dabadood
3. Waxay sida ugu habboona u muuqataa in Fal 9:26 uu la xidhiidho Galatiya. 1:18. Fal 11:30 & 15:1ff. waxa weeyi kulamo aan la diiwaan gelinin oo lagu xusay Galatiya. 2:1.
4. Waxa jira xoogaa farqi ah oo u dhexeeya Fal 15 iyo Galatiya. 2 laakiin hubaashii waa
 - a. dhinacyo kala duwan
 - b. ujeeddooyinka kala duwan ee Luukos iyo Bawlos
 - c. xaqiiqadu waxa weeyi iyadoo Galatiya. 2 waxa lagayaabaa inay ahayd wakhti ka horreeyay kulanka lagu sheegay Fal 15 laakiinse uu la xidhiidho iyada.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 14:1-7

¹Waxaa Ikoniyon ka dhacday inay wada galeen sunagogga Yuhuudda. oo siday u hadleen aawadeed dad badan oo Yuhuud iyo Gariigba ah ayaa rumaystay. ²laakiin Yuhuuddii caasiyiinta ahayd ayaa waxay dadkii aan Yuhuudda ahayn ku kiciyeen oo si xun ugu direen walaalihii. ³Haddaba wakhti dheer ayay halkaas joogeen iyagoo geesinimo ugu hadlaya Rabbiga, kaasoo markhaati u furay hadalka nimcadiisa, wuxuuna siiyey inay calaamooyin iyo yaabab gacmahooda ku sameeyaan. ⁴Markaasaa dadkii badnaa oo magaaladu kala qaybsameen, oo qaar waxay raaceen Yuhuudda, qaarna rasuulladii. ⁵Markii dadkii aan Yuhuudda ahayn iyo Yuhuuddaba, iyaga iyo taliyayaashoodii. ay ku yaaceen inay caayaan oo dhagxiyaan. ⁶ayay garteen, oo waxay u carareen magaalooyinkii la odhan jiray Luka'oniya iyo Lustra iyo Derbe iyo dhulka ku wareegsan; ⁷meeshaasna ayay injiilka ku wacdiyeen dadka.

14:1 “Ikoniyon” Waxa jira kitaab qarnigii labaad ah oo loo yaqaano *The Acts of Paul and Thekla*, kaasoo sheegaya shaqadii Bawlos ka waday Ikoniyon. Kitaabkani waxa uu koobsanayaa qeexitaanka jidh ahaaneed ee lagu sheegay Bawlos: gaaban, bidaarleh, indho baroona leh oo fidsan. Maaha waxyi laakiinse waxa uu ka waramayaa saamayntii Rasuul Bawlos uu ku lahaa gobolka Aasiyada Yar. Badanaa dhulkana waxa ay hoos imanaysay Gobolladii Roomaanka ee Galatiya.

▣ **“galeen sunagogga”** tani waxay ahayd arrin caadi u ah Bawlos iyo Barnabas. Dhegaystayaashan oo isugu jiray Yuhuud iyo Giriig, waxa ay ahaayeen kuwo wax ka yaqaanna waxsii sheegyada Axdiga Hore iyo ballan qaadyadiisa.

▣ **“dad badan oo Yuhuud iyo Gariigba ah ayaa rumaystay.”** Weedhani waxay tusinaysaa ujeedada Falimaha Rasuullada. Injiilku si aada ayuu dadka oo dhan ugu faafayay. Waxyaalaha Axdiga hore ballan qaadyadiisu uga sii tilmaameen aadanaha oo dhan (cf. Bilowgii. 3:15; 12:3) hadda ayaa la garawsaday.

Haddaladan koobani waxay la xidhiidhaan korodhkii saa'idka ahaa ee kaniisadda oo ah mid caan ku ah qoraallada Luukos.

14:2 “Yuhuuddii caasiyiinta ahayd” badbaadada waxa lagu sheegay “rumaystay” (aayadda 1), indho la'aanta ruuxi ahaaneedna waxa lagu sheegay “caasinimo” ama “rumaysad darro.” Diiditaanka ka jawaab celinta injiilku waxa ay keenaysaa indho la'aan iyo lumitaan! Luukos waxa uu qorayaa jaahilnimadii Yuhuudda aan rumaysadka lahayn iyo silcintii socotay. Diiditaankooda ayaana ah ka albaabka u furaya rumaysashada kuwa aan ahayn Yuhuudda (cf. Rooma 9-11).

▣ **“ku kiciyeen”** waa fal guud aan Sabtuujantiga loogu adeegsaday kasoo horjeesashada (cf. I Samuu'eel. 3:12; 22:8; II Samuu'eel. 18:31; 22:49; I Taariikhdi. 5:26), laakiin Axdiga Cusub dhexdiisa waxa lagu adeegsaday halkan iyo Fal 13:50.

▣ **“ugu direen”** tani waa eray kale oo Sabtuujantiga loogu adeegsaday sharka iyo dadka sida xun ula dhaqma dadka kale. Luukos ereygan marar badan ayuu ku adeegsanayaa Falimaha Rasuullada (cf. 7:6,19; 12:1; 14:2; 18:10).

14:3 Ilaah waxa uu adeegsaday mucjisada si uu u ansixiyo dabiicaddiisa iyo runta ku jirta injiilka Ciise Masiix isagoo ku sameeyay meeshan cusub (cf. 4:29-30; Cibraaniyada. 2:4).

14:3 “Markaasaa dadkii badnaa oo magaaladu kala qaybsameen” Hadalka runtu hadiyo goor waxbuu kala qaybiya (cf. 17:4-5; 19:9; 28:24; Matayos. 10:34-36). Kuwo ka mid ahaa Yuhuuddii sunagogu way rumaysteen, laakiin kuwii kale waxay kasoo horjeesteen injiilka.

▣ **“qaarna rasuulladii”** middani waxay u noqonaysaa Bawlos iyo Barnabas. Cutubkan dhexdiisa (14:4 iyo 14) waa marka keliya ee Luukos uu eraygan u adeegsanayo cidkale marka laga reebo Labo iyo Tobankii. Barnabas waxa lagu tilmaamay rasuul (aayadda 14). Sidoo kalena waxa lagu sheegay I Korintos. 9:5-6. Kani waa macno ballaadhan oo ah ereyga “rasuul” kana baahsna Labo iyo Tobanka. Yacquub (Ciise walaalkiis xagga hooyo) waxa lagu tilmaamay rasuul sida ku xusan Galatiya 1:19; Silfanas iyo Timoteyos waxa lagu sheegay rasuullo sida ku xusan I Tesaloniika 1:1 iyadoo ay la socoto 2:6; Andorinkas iyo Yuniyas, waxa loogu yeedhay rasuullo sida ku xusan Rooma 16:6-7; iyadoo Abollosna loogu yeedhay rasuul sida ku xusan I Korintos 4:6-9.

Labo iyo Tobankii Rasuul waxay ahaayeen kuwo gaar ah. markii ay dhinteen cidina may beddelin (marka laga reebo Matiyas oo bedelay Yuudas, Fal 1). Si kastaba ha ahaatee, waxa jirta hadiyad socota oo ah rasuulnimada sida ku xusan I Korintos, 12:28 iyo Efesos 4:11. Axdiga Cusubi muu sheegin faahfaahin dheeraada oo ku saabsan sida ay hadiyaddu u shaqayso. Eeg Mawduucan Gaarka *apostellō* ah.

MAWDUUC GAARA AH: DIRISTA APOSTELLŌ

Eraygan dirista waxa luqada Giriigta lagu yidhaa (*apostellō*) waxaanu xambaarsan yahay macnayaal guud:

1. Waxa loo adeegsaday qof ergay ah oo kuwo kale ergo u sida (2 Korintos 5:20).
2. Injiilku wuxuu badanaa eraygan u adeegsadaa Ciise Masiix oo Aabuhu soo diray. Injiilka uu qoray Yooxanaa waxay qaadanaysaa farriinta Masiixa (Matayos 10:40; 15:24; Markos 9:37; Luukos 9:48)

iyo gaar ahaan Yooxanaa 4:34; 5:24,30,36,38; 6:29,38,39,40,57; 7:29; 8:42; 10:36; 11:42; 17:3,8,18,21,23,25; 20:21) *pempōused*. Sidoo kale waxa loo adeegsaday Ciise oo diray xerta (Yooxanaa 17:18; 20:21).

3. Axdiga Cusubi wuxuu u adeegsaday xerta:
 - a. Labo iyo tobankii ahaa xerta Ciise (Luukos 6:13; Falimaha Rasuullada 1:21-22).
 - b. Koox gaara oo ahaa caawiyayaasha Rasuullada sida:
 1. Barnabas (Falimaha Rasuullada 14:4,14)
 2. Andaronikos iyo Yuniyas (Rooma 16:7).
 3. c Abolloos (I Korintos 4:6-9).
 4. Yacquub oo ahaa Sayidka walaalkiis (Galatiya 1:19).
 5. Silfaanoos iyo Timoteyos (1 Tesalonika 2:6).
 6. Waxa suurto gal ah Tiitos (2 Korintos 8:23)
 7. Waxa suurto gal ah Ebafraditos (Filiboy 2:25).
 8. Hadiyad kaniisaddu leedahay oo ilaa hadda socota (1 Korintos 12:28-29; Efesos 4:11).
4. Bawlos ayaa magacan adeegsanaya waraaqihiisa badanaa marka uu qorayay, waxaanu sheegayaa in Ilaah siiyay awood uu ku matalayo Ciise Masiix (Rooma 1:1; 1 Korintos 1:1; Galatiya 1:1; Efesos 1:1; Kolosay 1:1; 1 Timoteyos 1:1; 2 Timoteyos 1:1; Tiitos 1:1).

14:5 “yaga iyo taliyayaashoodii” waxa middani ay sheegi kartaa hoggaamiyayaashii magaalada ama hoggaamiyayaashii sunagoga. Kuwo ka mida culimadii hore iyo mufasiriinta casriga ahi waxay sheegaan labo silcinood (1) aayadda 2 iyo (2) aayadda 5, laakiin macnuhu waxa uu tusinayaa mid keliya.



NASB, NRSV,

TEV “si xun ula dhaqmaan”

NKJV “caayaan”

NJB “weeraraan”

Ereyga Giriigga ah *hubrizō* waxa uu ka xeel dheeryahay “si xun ula dhaqmid” ama “fawdo samayn.” Waxa uu aad caan ugu yahay Sabtuujantiga dhexdiisa. Luukos waxa uu ereygan u adeegsanayaa badanaa saddex macne.

1. cay, Luukos 11:45
2. fal fawdo ah, Luukos 18:32; Fal 14:5
3. luminta hantida jidh ahaaneed, Fal 27:10,21

▣ **“dhagxiyaan”** tilmaanta labaad waxa ay tusinaysaa sida kacdoonku u rabeen inay weeraraan rumaystayaasha. Dabcan Yuhuuddu middan waxay u doorteen waayo waxay la xidhiidhaa qofka cayda sameeya Axdiga Hore dhexdiisa (i.e., Laawiyiintii. 24:16; Yooxanaa 8:59; 10:31-33).

14:6 “oo waxay u carareen magaalooyinkii la odhan jiray Luka'oniya iyo Lustra iyo Derbe” Ikoniyan waxay ku taallay Firjiya. Waxay u dhowayd xadka koox qabaa'il ah. faahfaahintanina waxay tusinaysaa taariikhaynta kitaabka Falimaha Rasuullada.

14:7 Falkani waa mid aan dhammaystirnayn, macnihiisuna yahay inay marar badan wax wacdiyeen. Tani waa ujeeddada socdaalladii adeegitaanka Bawlos (cf. 14:21; 16:10). Kuwa isku halleeyay Masiixa wacdintiisa aawadeed iyaguna sidoo kale waxay dareemeen muhiimadda ku jirta in kuwa kale la gaadhsiyo injiilka. Tani waxay ahayd muhiimadda (cf. Matayos. 28:19-20; Luukos 24:47; Fal 1:8)!

NASB (UPDATED) TEXT: 14:8-18

⁸lustra waxaa fadhiyey nin aan cagaha xoog ku lahayn, oo tan iyo markuu uurka hooyadii ka dhashay curyaan ahaa, kaasoo aan weligiis socon. ⁹Isagu wuxuu maqlay Bawlos oo hadlaya, kaasoo indhaha aad ugu fiiriyey, gartayna inuu rumaysad uu ku bogsan karo leeyahay, ¹⁰wuxuuna cod dheer ku yidhi, Cagahaaga sare isugu taag. Markaasuu booday oo socday. ¹¹Markii dadkii badnaa arkeen wixii Bawlos sameeyey, ayay codkoodii sare u qaadeen, iyagoo afkii Luka'oniya ku leh, ilaahyadu waxay inoogu yimaadeen iyagoo sidii niman u eg. ¹²Barnabasna waxay u bixiyeen Yubiter; Bawlosna waxay u bixiyeen Merkuriyos, maxaa yeelay, wuxuu ahaa kii hadalka waday. ¹³Markaasaa wadaadkii Yubiter oo macbudkiisu ku yiil magaalada horteeda, wuxuu irdaha keenay dibiyoy, iyo ubaxyo isku taxan, wuxuuna doonayay inuu dadkii badnaa la sadqeeyo. ¹⁴laakiin rasuulladii Barnabas iyo Bawlos markay maqleen, ayay dharkoodii jeexjeexeen. oo dadkii badnaa ku soo dhex boodeen, iyagoo ku dhawaaqaya ¹⁵oo leh, Niman yahow, maxaad waxyaalahan u samaynaysaan? Annagu waxaannu nahay niman idinla dabiicad ah, oo waxaannu idiin keenaynaa war wanaagsan inaad ka soo jeesataan waxyaalahan aan micnaha lahayn oo u jeesataan Ilaaha nool, kaasoo sameeyey samada iyo dhulka iyo badda iyo waxyaalaha ku jira oo dhan, ¹⁶kaasoo qarniyada tegey quruumaha oo dhan u oggolaaday inay jidadkooda ku socdaan. ¹⁷Hase ahaatee isu maragfur la aan iskama sii dayn, laakiin wanaag buu sameeyey. oo wuxuu samada idinka siiyey roob iyo xilliyo barwaaqo ah, isagoo qalbiyadiinna ka dherginaya cunto iyo farxad. ¹⁸Markay waxyaalahaas yidhaahdeen, ayay dadkii badnaa dhib kaga joojiyeen inay u sadaqeeyaan iyaga.

14:8 “lustra” Tuuladani waxay ahayd meeshii uu ku noolaa Timoteyos (16:1). Mustacmaraddan Roomaanka waxa aasaasay Augustus sanadkii C.D. 6. Waxa halkaas ku yaallah sunagoga, sidaas darteedna Bawlos iyo Barnabas waxa ay ahaayeen kuwo wax ka wacdiyay.

Haddaba may jirin wax khiyaano ah oo suurto gal ahi (3:2). Waxa jira saddex waxyaalood oo sheegaya xaaladda ninkan

1. lugihiisa xoog kuma jirin
2. isagoo curyaan ah ayuu kasoo baxay uurka hooyadiis
3. weligiis muu socdaalin.

▣ **“xoog ku lahayn”** ereyga *adunatos* hadiyo goor macnihiisu waa “aan suurto gal ahayn” ama “aan awoodi karin” (cf. Luukos 18:27; Cibraaniyada. 6:4,18; 10:4; 11:6), laakiin halkan Luukos waxa uu uga adeegsanayaa sida qoraaga caafimaadka yaqaana isagoo tilmaamaya taag darradiisa (cf. Rooma. 8:3; 15:1).

Waxa xiiso leh iyada oo Luukos uu siyaabo badan uu isula simayo adeeggii Butros iyo kii Bawlos. Butros iyo Yooxanaa waxa ay bogsiiyeen nin curyaan ah sida ku xusan 3:1-10 imikana waxa sidan oo kale samaynaya Bawlos iyo Barnabas.

14:9 “kaasoo indhaha aad ugu fiiriyey” Luukos weedhan marar badan ayuu adeegsanayaa (cf. 3:4; 10:4). Eeg fiirada 1:10. Bawlos waxa uu arkay in ninkani uu wax dhegaysanayo, sidaasi darteedna waxa uu ku amray inuu istaago oo socdo (aayadda 10) waanu sameeyay sidaas!

▣ **“inuu rumaysad uu ku bogsan karo leeyahay”** middan waxa loo adeegsaday iyadoo tusinaysaa “badbaado,” loogalana jeedo badbaadin jidh ahaaneed. Fiiri u yeelo iyada oo Bawlos awooddiisa wax bogsiiinta ay ku salaysan tahay rumaysadka ninka. Tani waa badanaa, laakiin maaha gaar, waana xaaladda ku sugan Axdiga Cusub (cf. Luukos 5:20; Yooxanaa 5:5-9). Mucjisooyinku siyaabo dhowra ayay u shaqeeyaan:

1. si ay u tusiyaan jacaylka Ilaaha
2. si ay u tusiyaan awoodda iyo runta ku jira injiilka
3. si ay u tabo baraan una dhiirri geliyaan rumaystayaasha kale ee jooga.

14:11 “afkii Luka'oniya ku leh” waxa cad iyada oo Bawlos iyo Barnabas aanay fahmin waxa dadku lahaayeen. Tani waxa ay ahayd luqada gaarka u ah gobolkan.

14:12 “Barnabasna waxay u bixiyeen Yubiter; Bawlosna waxay u bixiyeen Merkuriyos, maxaa yeelay, wuxuu ahaa kii hadalka waday.” Dhaqanka maxalliga ahi waxa uu sheegay in ilaahyadii Giriiggu ay badanaa kusoo booqan jireen qaab bani aadan (cf. Ovid, *Metamorphoses* 8:626ff). qoraallada maxalliga ah waxa aan ka baranaynaa in halkani ay ahayd meel Zeuz iyo Hermes lagu caabudi jiray (aayadda 13).

Fiiro u yeelo iyada oo Barnabas ugu horrayn la sheegay. Tani waxa weeyi waayo Bawlos oo ah afhayeenku in dadkan jaahilka ahi u fahmayaan inuu yahay Hermes (Mercury); halka ka aamusan oo ah Barnabas uu ka yahay ilaaha sare ee Zeus (Jupiter)

14:13 “irdaha” tani waxa ay tilmaami kartaa magaalada ama macbadka Yubitar (Zeus) kaasoo ku yaallay magaalada dibaddeeda oo iridda waajahayay. Waxa uu ahaa wakhti ay jirtay wareer badan iyo is fahan la’aan.

14:14 “rasuulladii” eeg fiirada 14:4.

▣ **“ayay dharkoodii jeexjeexen”** tani waxa ay calaamad u tahay murugada iyo cayda (cf. Matayos. 26:65; Markos 14:63). Waxa xitaa ay tusinaysay kuwa jaahilka ah in ay jirto dhibaato.

▣ **“ku soo dhex boodeen”** tani waa eray caan ku dhex ah Sabtuujantiga “ku soo dhex boodid” inkasta oo halkan oo keliya lagaga adeegsaday Axdiga Cusub. Bawlos iyo Barnabas waxa ay soo dhex galeen dadka dhexdooda.

14:15-17 halkan waxa ah soo koobitaanka wacdintii ugu horraysay ee Bawlos siiyay kuwa jaahilka ah. waxa ay aad uula mid tahay wacdintiisa uu ku sameeyay Mars Hill dusheeda (cf. 17:22-33).

14:15

NASB, “niman idinla dabiicad ah”

NRSV “waxaan idinla mid nahay idinka”

TEV “anaga laftayadu waxaanu nahay dad idinla mid ah”

NJB “waxaanu nahay oo keliya dad idinka idinla mid ah”

Ereygani waa *homoioopathēs*, kaasi oo ah lakabka “la mida” iyo “dareeno.” Ereygan waxa lagu adeegsadan halka iyo Yacquub 5:17 Axdiga Cusub dhexdiisa. Dadkii jaahiliinta ahaa waxay Bawlos iyo Barnabas moodeen inay yihiin ilaahyo (*homoioōthentes*, cf. aayadda. 11), taasi oo macneheedu yahay “in loo sameeyay sida” dad. Bawlos waxa uu adeegsanayaa inay isku asal yihiin si uu tusiyo inay yihiin dad. Luukos waxa uu muujinayaa is hoosaysiinta Bawlos iyo Barnabas iyagoo ka duwan Herodos Antibas sida ku xusan 12:20-23.

▣ **“inaad ka soo jeesataan waxyaalahan aan micnaha lahayn”** ereyga “micno lahayn” waxa uu ka dhiganyahay wax bilaa faa’ido ah oon jirin. Bawlos waxa uu si toos ah u tusinayaa iyagu jaahilnimada ay ku suganyihiin.

▣ **“oo u jeesataan Ilaaha nool”** tani waa mid uu ku sifoobay YHWH, isaga oo ka ahaaday falka Cibraaniga ah ee “ahaansho” (cf. Baxniintii. 3:14). YHWH waxa weeyi ka weligiis nool ee ah Ilaah nool. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Magacyada Ilaahnimada 1:6.

▣ **“kaasoo sameeyey”** waa xigasho ka ahaatay Baxniintii. 20:11 ama Sabuurka. 146:6. Ereyga Cibraaniga ah ee *Elohim* (cf. Bilowgii. 1:1) waxa uu Ilaah ku tilmaamayaa abuuraha iyo arsaqaaha (cf. *The Expositor’s Bible Commentary*, vol. 1, pp. 468-469) sida uu YHWH isugu tilmaamayo Badbaadiyaha (cf. *The Expositor’s Bible Commentary*, vol. 1, pp. 471-472) iyo Ilaaha ah axdi sameeyaha. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:6.

14:16 “kaasoo qarniyada tegey quruumaha oo dhan u oggolaaday inay jidadkooda ku socdaan” weedhani waxa ay si aan toos ahayn u sheegi kartaa Sharciiga Kunoqoshadiisa. 32:7-8 kaasoo Muuse uu ku sheegayo YHWH oo ah ka asaasa xadadka quruumaha. Fiqi ahaan tani waxay tusinaysaa Ilaah oo daryeela quruumaha oo dhan (kuwa aan Yuhuudda ahayn, cf. Girdlestone, *Synonyms of the Old Testament*, pp. 258-259). Ilaah waxa uu doonay inay isaga gaartaan, laakiin leexashada aadanaha ayaa ku sababtay ka gaar noqosho iyo sanam caabudis (cf. Rooma. 1:18-2:29). Si kastaba ha ahaatee, iyaga kamuu hadhin Isagu (aayadda 17).

Jaahilnimada kuwa aan Yuhuudda ahayni ay ka jaahilka yihiin Ilaah waxa la barbar dhigay aqoonta Yuhuuddu ay u leeyihiin Ilaah. waxa lala yaabo waxa ah in kuwa aan Yuhuudda ahayni ay ka jawaab celiyeen oo rumaysteen injiilka, halka Yuhuuddu ay kaga jawaab celiyeen diidmo iyo silcin ay kaga hortagaan injiilka (cf. Rooma 9-11).

14:17 “isu maragfur la aan iskama sii dayn,” tani waxa weeyi fikirka la xidhiidha dabiicadda is muujinta cf. Sabuurka. 19:1-6; Rooma. 1:19-20; 2:14-15). Aadanaha oo dhami waxay garanayaan wax ku saabsan Ilaah iyaga oo ku garanaya abuurka iyo markhaatiga gudohooda ku jira.

▣ **“roob...cunto”** dhaqankii dadkaas jaahilka ahi lahaayeen waxa ka mid ahaa iyaga oo sheegay in Zeus uu ahaa ka keena roobka halka Hermes uu isna ka keeni jiray cutada. Bawlos isaga oo raacaya Sharciga Kunoqoshadiisa 27-29 waxa uu sheegayaa in Ilaah uu dabecadda maamulo.

Jaahiliintani may garanaynin Ilaah sidaas darteedna habaarka axdiga ee ku sugan Sharciga Kunoqoshadiisa waxa lagu bedelay Ilaah samirkiisa (cf. Fal 17:30; Rooma. 3:25; 4:15; 5:13). Bawlos waxa uu doorashada Ilaah ee gaarka ah (rasuulka kuwa aan Yuhuudda ahayn) si uu u gaadho quruumaha! Bawlos waxa uu isticmaalayaa dabiicadda iyo Ilaah sida uu u sameeyay makhluuqaadka (cf. Sabuurka. 145:15-16; 147:8; Yeremyaah. 5:24; Yoonis 1:9) iyo sida uu isagu ula xidhiidho iyaga.

Waxa xiiso leh iyada oo soo koobitaanka wacdintani aanu la mid ahayn injiilka. Waxa loo malayn karaa in Bawlos uu laynkan raacay marka uu bixinayo wacdintiisa Ateniya ee ku sugan Fal 17:16-34. Waxa lala yaabi karaa haddii Luukos uu soo koobitaankan ka helay Bawlos ama Timoteyos (halkani waxay ahayd meeshuu deganaa).

14:18 tani waa faahfaahinta markhaatiga goob joogga ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 14:19-23

¹⁹Laakiin waxaa Antiyokh iyo Ikoniyon ka yimid Yuhuud, oo markay dadkii badnaa yeelsiiyeen, ayay Bawlos dhagxiyeen, oo magaaladii ka jiiddeen, iyagoo u malaynaya inuu dhintay. ²⁰Laakiin intii xertii hareerihisii taagnaayeen, ayuu kacay, markaasuu magaaladii galay; maalintii dambena wuu ka baxay oo Barnabas u raacay Derbe. ²¹Oo markay magaaladaas injiilkii ku wacdiyeen oo kuwo badan xer ka dhigeen. ayay ku noqdeen Lustra iyo Ikoniyon iyo Antiyokh. ²²Iyagoo nafihii xerta ku xoogaynaya, kuna waaninaya inay iimaanka ku sii wadaan iyagoo ku leh, Waa inaynu dhibaatooyin badan ku galnaa boqortooyada Ilaah. ²³Oo markay iyagii kiniisad walba waayeello uga dooreen oo ay soon ku tukadeen, waxay iyagii ku ammaana geliyeen Rabbiga ay rumaysteen.

14:19 kacdoonnadii Yuhuudda ee magaaloooyinka Bawlos wacdiyay ayay waxay ku midoobeen inay isaga weeraraan (cf. II Kornitos. 4:7-15; 6:3-10; 11:23- 30). Fiiro u yeelo iyada oo weerarka uu diiradda saarayay Bawlos oonu saaraynin Barnabas. Sidoo kale fiiro u yeelo dadkii jaahilka ahaa oo noqday kuwo aan isku kalsoonayn. Bawlos iyo Barnabas waxa loo sharfay sida ilaahyo haddana markii xigtay waa la dhagxiyey!

▣ **“ayay Bawlos dhagxiyeen”** tani may ahayn mucjiso sarakicis ah, laakiin sheegista adkaysashadii jidh ahaaneed iyo geesinimadii Bawlos (cf. aayadaha. 20-21). II Korintos 11:25 iyo Galatiya 6:17 ayaa sidoo kale sheegaya dhacdadan. Dhagxinta waxa lagu qorsheeyay aayadda 5 imikana waa laga dhabeeyay!

14:20 “intii xertii hareerihisii taagnaayeen” inkasta oo si gaara aan loo sheegin, waxaan u malaynayaa in halkani ay ahayd kulan tukasho kaasoo si layaab leh Ilaah uga jawaab celiyay. Fiiro u yeelo sida silcintu usii socotay iyadoo lagasoo horjeeday faafinta injiilka (magaalo cusub).

14:21 “Oo markay magaaladaas injiilkii ku wacdiyeen” tani waxa ay sheegaysaa Derbe (aayadda 20). Magaaladani sidoo kale waxay ahayd qayb ka mida Likoniya oo ahayd mid ka tirsan gobolkii Roomaanka ee Galatiya. Waxa ay ahayd dhinaca bari markii ay Bawlos iyo Barnabas ku dhexjireen socdaalkoodii adeegga ahaa.

Magaaladani waxa ay ahayd mid si layaableh ugu jawaab celisay injiilka oo kuwa badanina ku badbaadeed.

▣ **“ayay ku noqdeen Lustra iyo Ikoniyon iyo Antiyokh.”** Wacdin fagaare ah may samaynin markii ay laabteen, laakiin si gaara ayay u sameeyeen iyagoo dhiirri gelinaya rumaystayaasha (aayadaha 22-23).

14:22 aayaddani waxay soo koobaysaa farriintii Bawlos ee xer ka dhigista. Fiiro u yeelo iyada oo diiradda saaraysa (1) dadaalka iyo (2) dhibaataada. Rumaystayaasha waxay qaan gaadh ku noqdeen dhibaatooyin (cf. Rooma. 5:3-4; 8:17-18; I Tesaloniika. 3:3; II Timoteyos. 3:12; Yacquub 1:2-4; I Butros. 4:12-16).

▣ **“ku xoogaynaya”** ereygan marar badan ayaa lagu adeegsaday Sabtuujantiga isaga oo tusinaya “ku adkayn” ama “asaasid.” Luukos waxa uu ereygan adeegsanayaa marar badan isaga sheegaya Bawlos oo la socday adeegga xer ka dhigista (cf. 14:22; 15:32,41; 18:23).

▣ **“nafihii xerta”** ereyga naf (*psuchē*) waxa loo adeegsaday qofka iyo dhaqdhaqaaqiisa, Tani maaha fikir Giriig ah oo loo adeegsanayo qof kasta oo leh naf, laakiin waa fikir Cibraani ah oo loo adeegsanayo nafta (*nephesh*) BDB 659, KB 711-713, cf. Bilowgii. 2:7) iyada oo la tilmaamayo dadka (cf. Fal 2:41; 3:23; 7:14; 14:2,22; 15:24; 27:37).

▣ **“kuna waaninaya inay iimaanka ku sii wadaan”** eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: U BAAHNAANTA SII SOCOSHADA

Way adag tahay in la qeexo madhab yada baybalka ee nolosha Masiixiyiinta maxaa yeelay waxaa loo muujiyey laho ahaan kuwo galbeedka ku xiran. Labadan hab waxaad mooddaa in ay iska hor imanayaan laakiin weli waa isla baybalkii. Masiixiyiinta Galbeedku waxay go'aansadeen in ay doortaan midh qura oo ay ka istaagaan tii kale ee taa liddiga ku ahayd. Bal aan sharraxaad ka dhiibo.

1. Badbaadadu ma go'aanka koowaad ee Masiixa la aamminaa, mise waa nolol lagaa rabo in aad weligaa xernimo u diyaar ahaatid?
2. Badbaadadu ma doorashaa halkii ay noqol lahayd nimco Ilaaha Weyn nooga timid mise rumaysadka iyo tawbadkeenka aadanaha ayaa u ah jawaab lagu helo deeqda rabbaaniga ah?
3. Ma hal mar baa la helaa badbaadada, oo macquul ma aha in la lumiyo, mise waxaa jirta baahi loo qabo in si joogto ah loo wado.

Arrintan dulqaadashadu waa mid weligeed ka soo dhex jirtay taariikhdii kaniisadda. Dhibaataadu waxa ay si toos ah uga bilaabanaysaa isku dhacyada qoraallada sida tooska ah isaga hor imanaya ee Axdiga Cusub:

1. Hubsashada qoraalka
 - a. Hadalladii Ciise (Yooxanaa 6:37; 10:28-29)
 - b. Hadalkii Bawlos, (Rooma 8:35-39; Efesos 1:13; 2:5,8-9; Filiboy 1:62:13; II Tesaloniika 3:3 II Timoteyos 1:12; 4:18)
 - c. Hadalkii Butros (I Butros 1:4-5)
2. Qoraallada loo baahan yahay in ay sii socdaa
 - a. Hadalladii Ciise (Matayos 10:22; 13:1-9,24-30; 24:13; Markos 13:13; Yooxanaa 8:31; 15:4-10; Muujintii 2:7,17,20; 3:5,12,21)
 - b. Hadalladi Bawlos Rooma 11:22; I Korintos 13:5; Galatiya 1:6; 3:4; 5:4,6:9; Filiboy 2:12; 3:18-20; Kolosay 1:23)
 - c. Hadalladii qoraagii Cibraaniyada (2:1; 3:6,14; 4:14; 6:11)
 - d. Hadalladii Yooxanaa (I Yooxanaa 2:6; II Yooxanaa 9)
 - e. Hadalka Aabbaha Muujintii 21:7)

Badbaadada Baybalku waxa ay ka soo baxdaa jacaylka, naxariista, iyo nimcada Ilaah weyn ee qaadirka ah. Ma jiro aadane badbaadi kara haddii aanu Ruuxa Qudduuska ahu ku toosin (cf. Yooxanaa 6:44,65). Barashada Kitaabka ayaa marka hore timaadda oo arrinta ayey hagaajisaa, laakiin waxay ku xiran tahay hadba sida aadanuhu uga jawaabo iimaanka iyo yawbad keenka, bilow ahaan iyo joogto ahaan labadaba. Ilaah wuxuu

aadanaha kula shaqeeyaa xiriir axdi leh. Ahmiyado iyo masuuliyado ayuu leeyahay labadaba oo ku jira!

Aadanaha oo dhan waa loogu deeqay badbaadada. Dhimashadii Ciise waxa ay la macaamishay dhibaataadii dembigii aadanihii dhacay. Ilaah waddo ayuu siiyey wuxuuna kuwa isaga araggiisa ka abuuran oo dhan ka doonayaa in ay gartaan jacaylkiisa iyo shaqadiisa weyn ee uu noogu qabtay Ciise Masiix. Haddaad jeclaan lahayd in aad aqrisid in badna oo maaddadan ku saabsan adigoo wax jaraa oo madhabtra Calvin ah ka sugayn , ka eeg

1. Dale Moody, *The Word of Truth*, Eerdmans, 1981 (PP 248-365)
2. Howard Marshall, *Kept by the power of God*, Bethay fellowship, 1969
3. Robert Shank, *Life in the Son*, Westcott, 1961

Kitaabka Qudduuska ahu labo dhibaato oo kala wuan ayuu meeshan ku sheegayaa: In aad hubsashada u qaadatid sidii sharci wax kuu fasaxaya waa in lagu noolaado mro la'aan iyo nolol danaystenimo (2) iyo adigoo ku dhiirri gelinaya kuwaa iyagu la hardamaya hawsha iyo dembiyadooda shaqsi ahaaneed. Dhibaataadu waxaa weeye in kooxaha qaldani ay qaaadanayaan farriin qaldan oo ay sidaas hab qaab climiyeed aan fadhin ku sameeyaan iyagoo qayb yar oo xadaysan oo Kitaabka ah. Masiixiyiinta qaar ayaa si aad u daran ugu baahan farriintan hubsashada, halka kuwo kale ay uga baahan yihiin digniino ad-adag! Kooxdee ayaad adigu ka tirsan tahay?

▣ **“boqortooyada Ilaah.”** tani waa weedh fasiraaddeedu adagtahay. Ciise badanaa waxa uu u adeegsaday iyada oo la xidhiidha adeeggiisa. Si kastaba ha ahaatee, Rasuulladu si fiican umay fahmin (1:3, 6). Sida ay Falimaha Rasuullada ugu sugantahay waxay la midtahay injiilka (cf. 8:12; 19:8; 20:25; 28:23,31). Si kastaba ha ahaatee, sida ku xusan 14:22 waxa ay qaadanaysaa waxyaalo gaara ah. waxa weeyi “marhore” (cf. Matt. 12:28; Luke 16:16) vs. “weli” (cf. Matayos. 24:14,30,36-37; 25:30,31; II Butros. 1:11) taasoo casrigan gaar u ah. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:17. Boqortooyadu waxay ku timid Ciise Masiix (Imaatinka Hore), laakiin waxa ay ku dhammaystirmaysaa mustaqbalka (Imaatinka Labaad).

14:23 “waayeello uga dooreen” ereyga “waayeelo” (*presbuteros*) waxa uu la mid yahay ereyga “sheekh” (*episkopos*) iyo “wadaad” (*poimenos*) Axdiga Cusub dhexdiisa (cf. Fal 20:17,28 iyo Tiitos 1:5,7). Ereyga “waayeel” waxa uu leeyay asal Yuhuudi (cf. Girdlestone, *Synonyms of the Old Testament*, pp. 244-246 iyo Frank Stagg, *New Testament Theology*, pp. 262-264), halka ereyga “sheekh” uu kala xidhiidho magac magaalo Giriiga. Waxa jira labo xil haye oo kaniisadda loogu diiwaan geliyay Axdiga Cusub: wadaaddo iyo mashaaiikh (Filiboy 1:1).

Ereyga “doorasho” waxa loogala jeedi karaa “ku doorashada gacmaha” (cf. II Korintos. 8:19 iyo Louw iyo Nida, *Greek-English Lexicon*, pp. 363, 484). Waxa mardanbe edaygan aabbayaashii kaniisaddu u adeegsadeen “subkitaanka.” Arrinta dhabta ahi waxa weeyi sidee “cod bixin ku doorashadu” ay ugu habboontahay macnaha? U codaynta kaniisadaha casriga ahi waxay u muuqataa midaan haboonayn (inkasta oo kaniisaddii Yeruusaalem ay u codaysay Todoba sida ku sugan Fal 6 kaniisadduna waxay u codaysaa si ay u xoojiso adeegii Bawlos ee kuwa aan Yuhuudda ahayn sida ku xusan Fal 15).

F. F. Bruce, *Answers to Questions*, p. 79 ayaa waxa uu ku leeyahay “asal ahaan waxay sheegaysay magacaabid ama doorasho iyadoo gacmaha lagu toosinayo (ku tilmaamista gacmaha), waxa ay awooddan lumisay wakhtiyadii Axdiga Cusub waxaanay noqotay in loogala jeedo uun ‘magacaabis,’ qaabku nooca uu doonaba ha ahaadee.” Cidina ma buunbuunin karto ama ma diidi karto qaabka wacdina ee ereygan loogu dhex adeegsaday Axdiga Cusub.

Fiiro u yeelo Bawlos oo wax baraya Tiitos si uu sidoo kale ugu magacaabo “waayeellada” laakiin Timoteyos oo jooga Efesos Bawlos waxa uu ku leeyahay daa kaniisaddu ha doorato dad leh hadiyado gaara (I Timoteyos 3). Hoggaamiyayaasha meelaha cusub waa la magacaabay, laakiin meelaha la asaasayo hoggaankooda waxa jaanis u qaatay dadka kaniisadda hoose.

Fiiro u yeelo in istaraatiijiyada adeegga Bawlos uu yahay asaasitaanka kaniisado maxalli ah kuwaasoo qaata shaqada wacdinta iyo xer ka dhigista meeshaas (cf. Matayos. 28:19-20). Kani waa qaabka Ilaah ee ku waajahan gaadhitaanka dunida oo dhan (kaniisadaha hoose)!

▣ **“kaniisad”** eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11.

▣ **“oo ay soon ku tukadeen”** waxa laga yaabaa in middan ay la mid tahay 13:2-3. Bawlos waxa uu waayo arag ku ahaa awoodda Ruuxa iyo u jihatayta xagga Antiyokh. Waxa uu sii waday tusaalihiiisa ruuxiga ah. waxay ahayd inay nafhooda u diyaariyaan Ilaah si uu doonistiisa ugu muujiyo. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Soonka 13:2.

▣ **“Rabbiga ay rumaysteen”** waa fal wax tusmaynaya, kaasi oo tusinaya fal sugnaa ilaa wakhti hore. Waayeelladan cusubi wakhti ayay lahaayeen rumaysad waxaanay muujiyeen kartida ay u leeyihiin soo bandhigista tayadooda hoggaaminta ah.

Qaab dhismeedkan naxwe ahaaneed ee *eis* oo lala xidhiidhiyay *pisteuō* (cf. Fal 10:43) waxaanu caan ku yahay qoraallada Yooxanaa, laakiin sidoo kalena waxa laga helayaa kuwa Bawlos (cf. Rooma. 10:14; Galatiya. 2:16; Filiboy. 1:29) iyo Butros (cf. I Butros. 1:8). Eeg Mawduucyada Gaarka ah ee Muhiimka ah 3:16 iyo 6:5.

▣ **“iyagii ku ammaana geliyeen Rabbiga”** tani ma sheegayso wax kamida subkista. Falka oo kale waxa lagu isticmaalay aayadda 26 ga Bawlos iyo Barnabas, halka 20:32 loo adeegsaday kuwa hore u ahaa waayeelka. Subkitaanku waa mid caawimo leh waxaanu xoojinayaa runta ku saabsan Ilaah oo dadkiisa ugu yeedhaya doorka hoggaaminta. Rumaystayaasha oo dhan waxa loogu yeedhay oo hadiyad loo siiyay adeegitaan (cf. Efesos. 4:11-12). Ma jirto kala soocid wadaadnimo ah oo ku sugan Axdiga Cusub dhexdiisa.

NASB (UPDATED) TEXT: 14:24-28

²⁴Markaasay sii dhex mareen Bisidiya oo yimaadeen Bamfuliya. ²⁵Oo kolkay hadalka kaga hadleen Berga ayay waxay tageen Ataliya; ²⁶meeshaasna waxay uga dhoofeen Antiyokh, taasoo ahayd meeshii iyaga lagaga ammaana geliyey nimcadii Ilaah shuqulkii ay sameeyeen aawadiis. ²⁷Oo markay yimaadeen oo kiniisaddii isu ururiyeen waxay uga warrameen waxyaalihii Ilaah iyaga la sameeyey oo dhan iyo siduu albaabka iimaanka ugu furay dadkii aan Yuhuudda ahayn. ²⁸Markaasay wakhti aan yarayn xertii la joogeen.

14:24 Gobolkan dhulka sare ah ee Bisandiya waxa uu ku yaallaa woqooyiga gobolka xeebta ah ee Bamfaliya. Berga waxay ahayd magaala madaxeedka gobolkan. Bawlos waxa uu mar hore dhaafay magaaladan (13:13), laakiin hadda wuu soo laabtay waxaanu ku wacdiyay injiilka (aayadda 25).

14:25 **“Ataliya”** waxay ahayd dakadda Berga.

14:26 **“uga dhoofeen Antiyokh”** iyagu kumay soo laabanin Qubrus. Barnabas waxa uu soo laaban doonaa kaddib markii Bawlos uu la murmay Yooxanaa Markos (cf. 15:36-39).

▣ **“iyaga lagaga ammaana geliyey nimcadii Ilaah”** falkani waa mid uu soo horreeyo mafcuulku. Socdaalkan adeeg ee ugu horreeyay waxa bilaabay oo sii waday Ruuxa waxaanu ahaa mid guulaysta.

14:27 **“Oo markay yimaadeen oo kiniisaddii isu ururiyeen waxay uga warrameen waxyaalihii Ilaah iyaga la sameeyey oo dhan”** fiiri u yeelo iyaga oo masuul u ahaa kaniisadda. “Xitaa Rasuulka kuwa aan Yuhuudda ahayn” waxa looga waramay kaniisadda (eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11). Sidoo kale waxay ogaysiiyeen cidda samaysay arrintan wayn- YHWH/Ruuxa.

Umay warramin hoggaamiyayaasha (13:1), laakiin dadkii kaniisadda markii danbana waxay ka warrameen adeeggii ay ka wadeen Yerusaaalem (15:4) iyo dhammaanba xaaladdii kaniisadihii ay jidka kusoo mareen (15:3). Waxaan u malaynayaa kaniisadda oo dhan ayaa ahayd kuwii gacanta iyaga saaray oo ugu deeqay socdaalkooda.

▣ **“iyo siduu albaabka iimaanka ugu furay dadkii aan Yuhuudda ahayn.”** Bawlos waxa uu adeegsaday weedhan “albaabka iimaanka” marar badan (cf. I Korintos. 16:9; II Korintos. 2:12; Kolosay. 4:3; sidoo kalena u firso Muujintii. 3:8). Ilaah waxa uu albaabka u furaa aadanaha odhan isagoo ugu furay injiilka cidina aanay xidhi karin. Ereyada Ciise ee ku sugan 1:8 hadda ayaa la dhammay tiray.

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Kor mar ku samee socdaalkii koobaad ee Bawlos iyo goobihii juquraafi ahaaneed.
2. Kor mar ku samee wacdintii Bawlos ee Yuhuudda iyo kuwa jaahilka ah labadaba.
3. Sidee soonku ula xidhiidhaa Masiixiyiinta casriga ah?
4. Muxuu Yooxanaa Markos uga hadhay kooxdii adeegga?

FALIMAHA RASUULLADA 15

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Golihii Yerusaaalem	Khilaaf ka taagan gudniinka	Mjuran ka taagan oggoolaanta kuwa aan Yuhuudda ahayn	Kulankii Yerusaaalem	Muran ka taagan Antiyokh
15:1-5	15:1-5	15:1-5	15:1-2 15:3-5	15:1-2 15:3-4 Muran ka Taagan Yerusaaalem 15:5-7a
15:12-21			15:12-18 15:19-21	15:12 Hadalkii Yacquub 15:13-18 15:19-21
U jawaabidii Golaha	Golihii Yerusaaalem Amarkii Golaha		Warqaddii Ku Socotay Rumaystayaashii aan Yuhuudda ahayn	Warqaddii Rasuullada
15:22-29	15:22-29 Sii Wadiddii Ka Dhex adeegiddii Suuriya	15:22-29	15:22-29	15:22-29 Wafii ku Socda Yerusaaalem
15:30-35	15:30-35	15:30-35	15:30-34 15:35	15:30-35
Kala Qaybsamiddii Bawlos iyo Barnabas	Qaybsamiddii Yooxamaa iyo Markos	Safarkii Loo Galay Adeegii Labaad	Kala Qaybsamiddii Bawlos iyo Barnabas	Bawlos oo Ka Go'ay Barnabas oo oo dooranaya Silas
15:36-41	15:36-41	15:36-41	15:36-41	15:36-38 15:36-40

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Cutubkan waxaa had iyo goor loogu yeeraa “Golaha Yerusaaalem.”
- B. Tani waa bar kulanka meeshii uu fiqiga Kaniisaddii Hore ka soo bilaabmay. si kale markii loo arkana waa labada xarumood ee kala ah Antiyookh iyo Yerusaaalem ee Masiixiyadda.
- C. Dhawrista dadkii aan Yuhuudda ahayn sida ku jirta Falimaha Rasuullada 8-11 waxa ay u muuqdaan in si gooni ah loogu oggolaaday in ay goonni yihiin (maysan ahayn kuwo si buuxda ficil ahaan u sameeya ficillada sanam-caabudidda), mana ah in siyaasad cusub lagu eryanayo (cf 11:19).
- D. Xidhiidhka uu cutubkani la eelyahay Galatiya 2 waa lagu muransan yahay. Falimaha Rasuullada 15 ama Falimaha Rasuullada 11:27-30 ayaa ahaan lahaa salka Galatiya 2. ka eeg hordhaca cutubka 14, C.
- E. Waa mid xiiso leh in calaammadda ee ku hadalka afafka kala duwan ee (cutubyada 2, 8 & 10; iyo sida macquulka ah aayadda. 8) laguma sheegin in dhammaan ay caddayn u tahay hubsashada badbaadada dadka aan Yuhuudda ahayn (i.e., kuwa aan diinta lahayn).

BARASHADA EREYADA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 15:1-5

¹Niman Yahuudiya ka yimid ayaa walaalihii wax baray iyagoo leh. Haddaan caadada Muuse laydinku gudin, badbaadi kari maysaan. ²Oo markii Bawlos iyo Barnabas wax aan yarayn kula murmeen oo ku su'aaleen iyaga, ayaa walaalihii waxay doorteen Bawlos iyo Barnabas iyo kuwo kale oo iyaga ka mid ah inay Yerusaaalem aadaan oo ay u tagaan rasuulladii iyo waayeelladii inay su'aashan kala hadlaan. ³Sidaas daraaddeed iyagoo kiniisaddu soo sagootiday, waxay sii dhex mareen Foynike iyo Samaariya, iyagoo ka warramaya sidii dadkii aan Yuhuudda ahayn u soo jeesteen; waxayna aad uga farxiyeen walaalihii oo dhan. ⁴Oo markay Yerusaaalem yimaadeen, ayaa kiniisaddii iyo rasuulladii iyo waayeelladiiba soo dhoweeyeen, markaasay waxay uga warrameen waxyaalihii Ilaah iyaga la sameeyey oo dhan. ⁵laakiin waxaa kacay kuwo dariiqadii Farrisiinta ahaa oo rumaysnaa, kuwaasoo leh, Waa in la gudo iyaga, oo lagu amro inay sharciga Muuse xajiyaan.

15:1 “Niman Yahuudiya ka yimid” Sadarkani eixa uu tilmaamayaa dhacdooyin ka dhacay Antiyookh. “xoogaa rag ah” waxa ay tilmaamaysaa koox Yuhuud rumaysad leh oo u taagnaa Ciise iyo Yuhuudda labadaba. Waxa ay Ciise u arkeen in uu yahay kaamilistii rumaysadkii Axdigii Hore (cf. Matayos. 5:17-19), ma aha mucaarad ama in uu beddelyao (cf. 11:2; 15:5; Galatiya. 2:12). Shaqsiyadan fiqigoodu waxa uu la xidhiidhay macallimiintii

Yuhuudda ee beenta ahaa (Judaizers) sida uu Kitaabka Galatiya tilmaamayo. Nimankani waxa ay si ahaan ku xidhnaayeen kaniisaddii Yerususalem (cf. aayadda. 24), laakiin maysan ahayn wakiillo sarsare. Xusuusnow waxa uu qoraalki odhanayaa “hoos.” Haddii aad maab ama qriidada eegto waxa ay u muuqataa “meel kore”, laakiin xagga Yuhuudda waa “hoos” fiqi ahaan, xagga Yerususalem (cf. aayadda. 2).

▣ **“bilaabay wax-barid”** Hadalkani waa fal tegay, oo macnihiisu yahay (1) bilaabay in ay wax baraan ama (2) baray marar isku xigxiga.

▣ **“Haddaan laydinku gudin”** Tani waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah, oo macnaheedu tilmaamayo fal awood weyn. Gudniinku waxa uu calaamad u ahaa axdigii Ibraahim iyo farcankiisa (cf. Bilowgii. 17:10-11). Yuhuudda dhexdeeda kama aysan ahayn xeer ama shuruud hoose, ee waxa ay ka ahayd mid la xidhiidha badbaadada qudheeda. Nimankani waxa ay dareemeen in jidka keliya ee YHWH loo soo maro uu yahay sharcigii Yuhuudda (cf. aayaddav. 5). Dadkan iyaga ah waxa loo aqoonsada in ay yihiin Judaizers (cf. Galatiya. 1:7; 2:4. Waxa ay rumaysnaayeen Ciise Masiix laakiin waxa ay rumaysadkaas ku darayeen amarradii Muuse (cf. aayadda. 5). Xaqnimadu waxa ay ku xidhnayd oo sal u ahaa fulintooda, ee ma ahayn hadiyadda furan ee Ilaah. Xidhiidhka Qofka xidhiidhka uu Ilaah la yeelanayo wax ay ku xidhanayd qofka camalkiisa (cf. Rooma. 3:21-30; Galatiya. 5:2-9). Arrinta dhabta ahi waxa ay ahayd kumay ahaayeen “dadka Ilaah” iyo side ayaa dabecaddooda loo caddayn karaa?

15:2 “Oo markii Bawlos iyo Barnabas wax aan yarayn kula murmeen oo ku su'aaleen iyaga” Luukos waxa uu caddayntan u adeegsanayaa “wada-hadal weyn” si uu dareen weyn ugu muujiyo (cf. Luukos 23:19,25; Fal 15:2; 19:40; 23:7,10; 24:5). Dooddani waxa ay ahayd mid aad u daranb! Waxa ay tilmaamaysay wadnaha farriinta injiilka:

1. Sidee ba qof xaq looga dhigi karaa si ula istaago Ilaah?
2. Miyuu Axdiga Cusub si aan kala sooc lahayn ugu xidhan yahay Axdigii Muuse?

Weedhu sida ay ugu jirto NASB, “had a great discussion and debate,” marka duluc ahaan la eego waa “dood iyo su'aal is weyddiin aan yarayn.” *Young's Literal Translation of the Bible* (p. 95), waxa uu odhanayaa “ma aha iska hor imaad iyo muran yar.” Qaabkan sida diidmada ah wax loogu caddeeyo waa mid uu Luukos is adag wax ugu caddeeyo qoraalladiisa. Ka eeg sharraxa buuxa ee 12:18.

▣ **“ayaa walaalihii waxay doorteen”** Tani waxa ay la xidhiidhaa “kaniisadda” (cf. aayadda. 3). Dhowr koox ayaa ku jira cutubka 15 oo la xidhiidha hoggaanka kala duwan ama that relate to the different leadership ama qaababka fikradeed.

1. Aayadaha 2,3,12, iyo 22 amar urur ayaa lagu dhex sheegayaa.
2. Aayadaha 6 iyo 22 waxaa lagu dhex sheegaya (i.e., Yacquub) amarka rususha, kaasoo ah nidaamka Kaatooligga ama Angalikaanka.
3. Aadayaha 6 iyo 22 amarka odayaasha ayaa lagu sheegayaa. Tan waxaa mooddaa in ay tilmaamayso ama la xidhiidho oo ay la siman tahay nidaamka Baresbaariyeriyanka.

Axdiga Cusub ayey qaababkan oo dhammi ku jiraan. Waxaa jira horumar ama imanaya amarka oo ku socda rasuullada (kuwaasoo maalin uun dhiman u lahaa) oo ku aaddan amarka jameecada, oo ay la jiraan wadaaddada oo ah hoggaanka katoooligga (cf. aayadda. 19). Aniga aragti ahaantayda waxaan qabaa in qaab-dhismeedka nidaamkani uusan muhiim u hayn sida kan ruuxiga ah ee hoggaamiyeyaasha. Shaqada Weyn, hoggaamiyeyaalka uu Ruuxu ka buuxo ayaa lagama maarmaan u ah injiilka. Habab dhab ah oo siyaasadeed ayaa ku xidhan oo kor iyo hoos u dhex socda, oo had iyo jeer ay dhaqanka iyo siyaasaddu sal u yihiin.

▣ **“iyo kuwo kale”** A. T. Robertson, *Word Pictures in the New Testament*, bogga. 224, waxaa ku jirta faallo muhiim ah oo ku aaddan aayaddan, “Sida dhabta ah Tiitos (Galatiya. 2:1,3), oo sida ay tahay ah Giriig walaalna la ah Luukos laguma dhex sheegin Falimaha Rasuullada.” Tani dhab ahaan waa wax macquul ah, laakiin waxa ay ku salaysan tahay male-awaallo. Waa in aan taas ka taxaddarnaa middaas maxaa yeelay haddii aan qoraalka (ku eegno malaheenna) waxa macnihiisu noqonayo ama shayga uu tilmaamayo, ma aha in uu yahay! Waa in aan eegnaa sida asalka ahayd ee qoraaga qoraalladiisa ee ma aha qiyaasaha malooyinkeenna, inkastoo ay dhacdo in ay noqon karaan.

▣ **“u tagaan rasuulladii”** Qaabka hoggaanka kaniisadda Yerusaaalem ma xasilloona. Marka dhoawr qoraal la eego waqxaad mooddaa in Yacquub oo walaal xagga hooyada kala ah Ciise, uu hoggaamiye ahaa. Tani waxa ay u muuqataa in ay tahay run sidoo kale ku jirta cutubkan. Welise waxaa jira kooxo hoggaamineed oo kale (cf. aayadaha. 4,22):

1. Labo iyo Tobankii Xerta ahaa
2. Odayadii degaanka
3. Jameecada sida ay u dhan tahay

Waxa aan la xaqiijin ayaa sida uu Yacquun ugu xidhan yahay kooxahan. Waxaa isaga lagu magacaabay Rasuul sida ku jirta Galatiya. 1:19. Waxaa sidoo kale macquul ah inuu ahaa hoggaamiye loo doortay inuu hoggaamiye u noqdo kooxda odayada (cf. Butros qudhiisa ayaa mu magacaabay inuu yahay hoggaamiye sida ku jirta I Butros. 5:1; Yooxanaa waxa uu ugu yeedhaa naftiisu oday sida ku jirta II Yooxanaa I and III Yooxanaa 1).

▣ **“waayeelladii”** Sida macnaha guud ahaaneed ku jirta “waaleelladii” ereygan ahu waxa uu tilmaamayaa koox waaweyn oo hoggaamiyeyaal horsed ah u ah sunaggooga tilmaan ahaan. Eeg sharraxa 11:30 or 14:23.

15:3 “kiniisaddu” Ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 5:11.

▣ **“waxay sii dhex mareen Foynike iyo Samaariya”** Kani waa fal tegay oo heerka dhexe ah oo wax caddayna Ugu dhawaan Foynike waxa ay ahayd magaalo dadka aan Yuhuudda ahayn, halka Samaariya ay ahayd magaalo dadka Yuhuudda ah iyo kuwa aan ahayn oo isku qasan. Meelahani waxa ay ahaayeen meelo horay loo wacdiyey (cf. 8:5ff; 11:19).

▣ **“, iyagoo ka warramaya sidii dadkii aan Yuhuudda ahayn u soo jeesteen”** Waxa ay u muuqataa in Bawlos iyo Barnabas ay soo sheegeen shaqada Ilaah oo ka dhex wado “quruumaha” ee jameeco kasta ee ay xidhiidh la lahaayeen. Dadka aqoonta u leh Axdigii Hore, soo jeesashada “quruumuhu” waxa ay u ahayd wax-sii-sheegid la oogiyeey (i.e., Ishacyaah. 2:2-4; 42:6; 49:6)! Waxaa sidoo kale macquul ah in sababta keentay in si waadax ah loo soo sheego ama loo soo ban dhigo guusha ay adeegayaashu gaadheen aysan kaniisadda Yerusaaalem u cuntamin in ay si tartiib ah oo sir ahaaneed u qariyaan arrintan soo baxday (cf. 21:18-20).

▣ **“waxayna aad uga farxiyeen walaalihii oo dhan”** Meelahani waxa ay ahaayeen meelo ay dadka aan Yuhuudda ahayn deggenaayeen. Kaniisaduhu waxa ay ahaayeen kaniisado isku dhaf ah. Jawaabtoodu waxa ay ahayd xusuus wax sii sheegid oo ku socota kaniisadda Yerusaaalem. Hawshii adeegga ee caalamiga ahayd waxa ay ku bilaabatay Yuhuuddii qurbaha, waxaana xoojiyey kaniisadihii Yuhuudda qurbaha.

15:4 “kiniisaddii iyo rasuulladii iyo waayeelladiiba” Halkan qaybahoodii siyaasadeed oo dhan ayaa lagu sharraxay sida ku jirta aayadda 22.

▣ **“waxay uga warrameen waxyaalihii Ilaah iyaga la sameeyey oo dhan”** Tani waxa ay noqotay masaal ama saambal!!

15:5 “laakiin waxaa kacay kuwo dariiqadii Farrisiinta ahaa oo rumaysnaa” In loo rumaysto Ciise in uu yahay Masiixii la ballan qaaday ayaa waxa ay ahayd salka ay kaniisaddu ku fadhido. Laakiin kaniisadda dhexdeeda waxaa ka jira aragtiyo kala duwan oo ku saabsan sida rumaysadkan Masiixa la rumaysanyo ugu xidhnaa axdiyadii iyo ballamihii loo qaaday Israa’iil. Kooxdan degaanka (“waxaa kacay” waxaa lagu horraysiiyey Giriigta si loogu muujiyo xoogga ku jira) in Faarisi badbaaday uu dareemay in Axdigii Hore uu ahaa mid la waxyooday oo abadi ah oo sidaas daraaddeed loo baahan yahay in la dhawro (cf. Matayos. 5:17-19)! Qofku waa in uu Ciise rumaystaa Muuse-na addeecaa (i.e., *dei*, laga maarmaan [1] in la gudo; [2]in la dacweeyo; iyo [3] in saddexdaba la ilaaliyo. Waa suaashan weyn midda qaabaynaysa taxa fiqi ahaaneed ee Rooma 1-8 iyo Galatiya! Mawduuc Gaar ah ka eeg: Faarisiinta 5:34.

▣ **“waa lama huraaan”** Ka ee sharraxa buuxa ee *deit* 1:16.

15:6 “rasuulladii iyo waayeelladii baa ururay” Halkan hoggaankii ayaa markii hore so goonni ah u kulmay. Tani waxa ay tilmaamaysaa habka siyaasadeed ee Barasbaateeriyanka.

15:7 “Oo kolkay wax badan su'aaleenna” Hoggaanka waa la isku raacsanaa. Qaar waxa ay raacsanaayeen hadalka ku jira aayadda. 5. Kuwan oo dahmii waxa ay ahaayeen rumaystayaal daacad ah. Laakiin qaar ayaa waxa ay ku sii dhegganaayeen aqootii ay u lahaayeen iyagoo ku indho belay dabeecadda lagama maarmaanka ah ee injiilka. Xitaa Rasuulladu way ku gaabnayd adeegisga tilmaamaha oo buuxa (cf. 8:1). Ogsoonow hababka siyaasad samaynta: (1) tashi gaar ah; (2) tashi furan; (3) jameecada oo doonaysa.

▣ **“Butros baa istaagay”** Tani waxa ay ahayd habkii loola hadli jiray kooxda marka la isku keeno (cf. aayadda. 5). Tani waa meesha ugu dambaysa ee lagu sheegayo isaga Falimaha Rasuullada dhexdooda. Waxa uu tilmaamayaa waayo-aragnimada uu u leeyahay Korneliyos (cf. Cutubyada 10-11).

▣ **“in dadka aan Yuhuudda ahayn ay afkayga hadalkii injiilka ka maqlaan oo ay rumaystaan”** Ilaah wuxuu u adeegsaday Butros in uu ku muujiyo jacaylkiisa iyo sida uu u aqbalayo quruumaha! Ilaah wuxuu qaabkan cusub ee fahankan u oggolaaday in uu ku fuliyo qaababkan.

1. marka koowaad reer Samaariya, cutubka 8
2. Enoogii Reer Itoobiya, cutubka 8
3. Korneliyos, cutubyada 10-11

Kuwani maysan ahayn kuwo ficillada caabudidda sanayyada ku sifoobay, laakiin waxa ay dhammaan ku xidhnaayeen Sharcigii Yuhuudda. Arrintu si kastaba aha ahaatee, 1 iyo 3 waxaa lagu xaqiijiyey ama lagu xoojiyey waayo-aragnimadii Bentakosti-ga, oo caddayn u ahayd kaniisaddii hore Ilaah aqbalaaddiisa kooxaha kale oo dhan.

15:8 “Oo Ilaaha qalbiga garta” Kani waxa uu ahaa hab Ilaah cilmigiisa kaamilka ah lagu soo ban dhigayo (cf. I Samuueel. 1:24; 16:7; Sabuurrada. 26:2; 139:1; Maahmaahyadii. 21:2; 24:12; Yereyaaah. 11:20; 17:10; Luukos 16:15; Rooma. 8:27; Muujintii. 2:23) ee rumaysadka kuwaas aan Yuhuudda ahayn ee soo laabtay.

▣ **“wuxuuna iyaga siiyey Ruuxa Qoduuska ah”** Tani waxa ay si buuxda ula xidhiidhaa ama u tilmaamaysaa isla qaabkii la soo maray ee Bentakosti-ga ee Ruuxa Qudduuska ah (“hadda si la mid sh isla sidii uu innaga inoo sameeyay”). Isla arrintan Ruuxa Qudduuska ah waxa uu nooceeda oo kale ka dhacay Yreusaamel, Samaariya, iyo Kaysariya. Waxa ay ahayd calaamad uu Ilaah Yuhuuddii rumaysadka lahayd ugu muujinayo aqbalaaddiisa kooxaha kale (cf. aayadda. 9; 11:17).

15:9 “inama kala soocin innaga iyo iyaga” Tani waxa ay ahayd gunaanadkii fiqigii uu Butros la yimid sida ku jirta 10:28,34; 11:12. Ilaah ma ahan midka shaqsiyada xushmeeya (cf. Galatiya. 3:28; Efesos. 3:11-4:13; Kolosay. 3:11). Aadanaha oo dhan waxa ay ka abuuran yihiin araggiisa (cf. Bilowgii. 1:26-27). Ilaah waxa uu doonayaa in aadanaha oo dhan ay badbaadaan (cf. Bilowgii. 12:3; Baxniintii. 19:5-6; I Timoteyos. 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; II Butros. 3:9)! Ilaah adduunka oo dhan ayuu jecel yahay (cf. Yooxanaa 3:16-17).

▣ **“qalbiyadooda rumaysad buu ku nadiifiyey”** Ereygan waxa lagu adeegsaday Sabtuujantiga iyada oo tusinaysa daahirinta Laawiyiinta. Waxa ay tusinaysaa ka nadiifsanaanta wixii inaga soocaya Ilaah. kani waa falka badanaa Butros khibraddiisa ee waxa nadiifta ah iyo waxa aan nadiifta ahayn sida ku sugan 10:15 iyo 11:9 (kaasoo raacaya LXX Bilowgii. 7:2,8; 8:20). Injiilka Luukos waxa loogu adeegsaday nadiifinta kuwa qaba baraska (cf. 4:27; 5:12,13; 7:22; 17:14,17). Waxa ay shabahaad xooggan u noqotay ka nadiifsanaanta denbiga (cf. Cibraaniyada. 9:22,23; I Yooxanaa 1:7). Qalbigu waxa uu ahaa Axdiga Hore dhexdiisa meesha ugu muhiimsan ee loo adeegsado jidhka oo dhan tilmaamitaankiisa. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:24. Kuwan aah Yuhuudda ahayn si buuxda ayaa loo nadiifiyay waxaanu iyaga Ilaah ku aqbalay Masiixa. waxa lagu nadiifiyay waxa weeyi rumaysadkooda ay ku yeeshen injiilka farriintiisa. Way rumaysteen, aqbaleen, si buuxdana isugu halleeyeen shakhsiyada iyo shaqada Ciise (cf. Rooma. 3:21-5:11; Galatiya. 2:15-21).

NASB (UPDATED) TEXT: 15:6-11

⁶Haddaba rasuulladii iyo waayeelladii baa ururay inay xaajadan ka tashadaan. ⁷Oo kolkay wax badan su'aaleenna, Butros baa istaagay oo ku yidhi iyagii, Walaalayaalow, waad og tihiin in maalmo hore Ilaah dhexdiinna ka doortay in dadka aan Yuhuudda ahayn ay afkayga hadalkii injiilka ka maqlaan oo ay rumaystaan. ⁸Oo Ilaaha qalbiga garta ayaa u markhaati furay iyaga, wuxuuna iyaga siiyey Ruuxa Quduuska ah siduu innagana inoo siiyey; ⁹oo inama kala soocin innaga iyo iyaga, laakiin qalbiyadooda rumaysad buu ku nadiifiyey. ¹⁰Haddaba maxaad Ilaah u jirrabaysaan inaad harqood qoorta xerta saartaan, kaasoo innaga iyo awowayaasheen aynaan qaadi karin. ¹¹laakiin waxaan rumaysan nahay inaynu ku badbaadi doonno nimcadii Rabbi Ciise siday ugu badbaadi doonaan.

15:10 “maxaad Ilaah u jirrabaysaan” asalka hadalkan Axdiga Hore ahi waxa weeyi Baxniintii. 17:2,7 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa. 6:16. Ereyga Giriigga ah ee “jarribaad” (*peirazō*) waxa uu la xidhiidhaa “jarribaadda aragti ku waajahan baabi’iin.” Waxa ay middani ahayd falaqayn khatar ah! eeg Mawduuca Gaarka ah 5:9.

▣ **“harqood”** waxa middan ay rabbaaniyiintu u adeegsadeen akhrinta *Shema*, Sharciga Kunoqoshadiisa. 6:4-5; sidaasi darteedna waxay u taagantahay sharciga, ka qoran iyo ka maskaxda lagu hayaba (cf. Matayos. 23:4; Luukos 11:46; Galatiya. 5:1). Ciise waxa uu ugu dhex adeegsanayaa Matayos 11:29 waxyaalaha laga rabo Axdiga Cusub ee isaga ku dhex jira.

▣ **“kaasoo innaga iyo awowayaasheen aynaan qaadi karin”** tani waxa ay ka tarjumaysaa waxbaristii Ciise (cf. Luukos 11:46). Mawduucan Bawlos ayaa kaga dhex hadlay Galatiya 3. Laakiin kani waa Butros oo sida Yacquub dareemaya culayska diinta Yuhuudda (cf. Galatiya. 2:11-21). Weedhu waxa ay tusinaysaa xaqiiqada fiqi ahaaneed ee ku saabsan sharciga oon keeni karin badbaadada, maxaa yeelay aadanaha leexday ma dhawri karaan sharciga (Rooma 7)! Badbaadada laguma salayn karo camaladda iyo waxyaalaha dadku ay sameeyaan. Si kastaba ha ahaatee, rumaytaha badbaaday, ee hadiyadda lihi wuxuu u baahan yahay inuu noolaado nolol cibaado leh (cf. Matayos. 11:30; Efesos. 1:4; 2:10). Cibaado yeelashadu (la midnimada Masiixa, i.e., Rooma. 8:29; Galatiya. 4:19; Efesos. 4:13) hadiyo goor waa ujeedada Masiixiyadda, si wacdinta loo siiyo jaanis, oon ahayn wax lagu faano ama sharci wax lagu xukumo.

15:11 Tani waa soo koobitaanka badbaadada (fal tegay oo mafcuulku soo horreeyo) ku ahaatay nimcada ku imanaysa iimaanka (Butros cf. Fal 2-3; Bawlos cf. 13:38-39; Rooma. 3-8; Galatiya 3; Efesos 1-2). Fiiro u yeelo jidka badbaadada oo isku mid u ah Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. Rooma. 3:21-31; 4; Efesos. 2:1-10).

NASB (UPDATED) TEXT: 15:12-21

¹²Dadkii badnaa oo dhammu way wada aammuseen; wayna dhegaysteen Barnabas iyo Bawlos markay uga warramayeen intay ahaayeen calaamooyinkii iyo yaababkii Ilaah gacantooda ku sameeyey dadka aan Yuhuudda ahayn dhexdooda. ¹³Kolkay aammuseen dabadeed ayaa Yacquub u jawaabay, isagoo leh. ¹⁴Walaalayaalow, i dhegaysta, Sime'oon waa ka warramay sidii Ilaah markii ugu horraysay u soo booqday dadka aan Yuhuudda ahayn inuu dad uga soo bixiyo iyaga magiciisa aawadiis. ¹⁵Taasuna waxay raacsan tahay hadalladii nebiyada; siday ugu qoran tahay, ¹⁶Waxyaalahaas dabadeed waan soo noqon doonaa. Oo mar labaad ayaan dhisi doonaa taambuuggii Daa'uud oo dhacay; Oo mar labaad ayaan dhisi doonaa jjabkiisa, Waanan taagi doonaa; ¹⁷Si nimankii hadhay ay Rabbiga u doondoonaan, Iyo quruumaha oo dhan oo magacayga loogu yeedho, ¹⁸Taas waxaa yidhi Rabbiga waxyaalahaas muujiyey tan iyo bilowgii dunida. ¹⁹Sidaas daraaddeed taladaydu waxay tahay inaynan dhibin kuwa ka mid ah dadka aan Yuhuudda ahayn oo Ilaah u jeestay; ²⁰laakiin inaynu u qorno iyagii inay ka fogaadaan wasakhnimada sanamyada, iyo sinada, iyo waxa la ceejiyo, iyo dhiigga. ²¹Maxaa yeelay, tan iyo qarniyadii hore waxaa Muuse magaalo walba ku leeyahay kuwa dadka ku wacdiya waxa isaga ku saabsan. oo Sabti walba sunagogyadaa laga akhriyaa.

15:12 “Dadkii badnaa oo dhammu way wada aammuseen; wayna dhegaysteen” Butros ereyadiisii waxa ay dejiyeen kooxdii hoggaamiyeyaasha ahaa. Marka macnaha guud laga eego waxaa weeye in labadii adeegayaal ay mar labaad dig uga hadlayaan aragtiyadoodii ku aaddannaa adeegoodii. Waqtigan hoggaankii ayaa maqlay! *Jerome Biblical Commentary* (qaybta. 2, bogga. 195) waxa uu rumaysan yahay in uu ahaa kulan kale goonni ka ah golaha kaniisadda sida ku jirta aayadaha. 6-11. Waxaan u malaynayaa inuu isla kulanka ahaa.

▣ **“Barnabas iyo Bawlos”** waxaad moodda in midkan la kala rogay maxaa yeelay kani waxa uu ahaa gurigii Barnabas ee kaniisadda ahaa.

▣ **“intay ahaayeen calaamooyinkii iyo yaababkii”** Ujeeddooyinkii fiqi ee afalkii lagu hadlay maalintii lagu Bentakostiga sida ku jirta Falimaha Rasuullada waxa ay calaamad u tahay aqbaladda Ilaah, haddaba qofku waxa uu la yaabi karaa in calaamaddan qaaska ah ay soo noqnoqnaysay uu had iyo goor ahaa hab adkayn ama xoojin ah.

Calaamadaha qudhooda waxa ay ahaayeen kuwo ay fuliyeen Ciise (cf. 2:22), Rasuulladii (cf. 2:43; 3:7; 4:16,30; 5:12), Toddobadii (cf. 6:8; 8:6,13), iyo Bawlos iyo Barnabas (cf. 14:3; 15:12). Ilaah waxa uu halkan ku caddaynayaa la-joogistiisa iyo awooddiisa uu calaamadahan iyo yaababkan. Kuwani waxa ay ahaayeen dhacdooyin dheeraad ah oo ku saabsan kooxda xeerka Yuhuudda oo la tusayo sida Ilaah uu sida buuxda u aqbalay kuwa aan diinta haysan, isaga oo ku aqbalay oo keliya nimco, uu rumaysadka u soo mariyey.

15:13 “Yacquub” Kani ma ahayn Rasuul Yacquub maxaa yeelay waa la dilay isaga marka la eego sida ku jirta Falimaha Rasuullada 12:1-2. Kani waxa uu ahaa kii Ciise xagga hooyada kala dhashay kaasoo noqday hoggaamiyaha kaniisadda Yerusaaalem iyo sidoo kale in uu ahaa qoraaga Kitaabka Axdiga Cusub ku jira ee Yacquub. Waxaa isaga loo yaqaan “Yacquubkii xaq ahaa.” Waxaa isaga mararka qaar loogu yeedhi jiray “jilibka Geela” maxaa yeelay waxaa had iyo goor isaga tukan jiray isaga oo jilbo jabsan. Labada hoggaamiye ee ugu muhiisan Yerusaaalem waa (Butros iyo Yacquub e) waa ay ka hadlayaan arrintan. Ka eeg Mawcuud Gaar ah: 12:17.

15:14 “Sime'oon” Kani waa habka ay luuqadda Aramaygga ee Sime'oon , kaasoo ah Butros sida ku qoran (cf. II Butros. 1:1).

▣ **“inuu dad uga soo bixiyo iyaga magaciisa aawadiis”** Middani waa xoojinta caalamiga ah ee nebiyadii hore ee ku jirta Axdigii Hore. (tusaale ahaanh. Ishacya. 2:2-4; 42:6; 45:20-23; 49:6; 52:10). Dadka Ilaah waxaa mar kasta ku jiray dad Yuhuud ah iyo dad aan Yuhuud ahayn (cf. Bilowgii. 3:15; 12:3; Baxniintii. 9:16; Efesos. 2:11-3:13). Weedha ah “magaciisa” waxaa laga yaabaa in ay tahay tilmaan ama masaal sida ku jirta Yeremyaah. 13:11 iyo 32:20 Ishacyaah. 63:12,14.

15:15-18 “it is written” Tani waa xigasho toos ah oo laga soo qaatay Caamoos 9:11-12 ee ku jirta qoraalkii Septuagint. Ereyga “quruun” ee ku jira aayadda 17 waa (qoomiyadda reer) *Edom* sida ku jirta qoraalka Masoretic, laakiin qoraalka Septuagint-gu waxa uu qorayaa *anthropos* (aadane). Yacquub waxa uu soo xiganayaa Septuagint-ga sababtuna waxaa weeye in uu ujeeddadiisa kaamilayo isagoo muujinaya dabeecadda caamka ah ee Ilaah ballantiisii madaxfurashada

Xusuusnow ficilladii la sii ballan qaaday waxa ay ka yimaadeen YHWH. Waxa ay la mid tahay sida ku jirta Yexesqeel. 36:22-38. Xusuusnow tirada “Anigu waxaan ahay”!

Xigashadan oo laga soo qaatay LXX-ku, oo si cad uga duwan MT-ga, waxa ay muujinaysaa in arrinta dhabta ah ee rumaysadku aysan ahayn qoraal dhammays tiran, laakiin ay tahay Ilaah iyo qorshiihiisa kaamilka ah ee uu u sameeyay aadanaha. Midkeenna ma jecla kala duwanaanshada qoraallada Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub, hase yeeshee ma aha wax saamaynaya rumaysadka rumaystayaasha ee ay Qorniinka ugu kalsoon yihiin. Ilaah ayaa si toosa isugu muujiyey aadanihii dhacay ama guul darraystay! Qoraal hore ee la soo min guuriyey raalli gelin uma moqonayso in la diido muujintan. Bal eeg Manfred Brauch, *Abusing Scripture*, cutubka 1, “The Nature of Scripture,” bogagga. 23-32.

15:16 Waa mid ku cad qoraalka in Yacquub dooranayo caddaynaya in xigashadan ka timid Septuagint-ga uu ku muujiyo sida ay quruumaha oo dhan ugu wada jiraan qorshahan. Miyuu sidoo kale qoraalkan u doortay in uu ku tilmaamo burburkii diinta Muuse ku jiray? Axdiga Cusubi si xad dhaaf ah ayuu uga duwan yahay. Oo waa

1. mid nimco ku salaysan, ma aha mid wax fulin ku salaysan (hadiyad ee ma aha mutaysi)
2. Mid Masiixa diiradda la saarayo, ma aha mid macbud diiradda la saarayo (Ciise ayaa ah macbudka cusub)
3. caalamka oo dhan ayaa diiraddu saaran tahay, ee diiradda lama saarayo sinji Yuhuud ka soo jeeda

Isbeddelladan waxa ay burburin lahaayeen “qaybta gudniinka” ee rumaystayaasha. Imminka taliyaha ah Rasuul (Butros), Rasuul Bawlos oo isna ahaa Yuhuudi soo Masiixiyobay iyo hoggaamiyihii kaniisaddii Yerusaaalem ee (Yacquub) ahaa, dhammaan waxa ay isku raaceen wax iyaga ka gees ah, sidii ay kaniisadda weyni samaysay iyo kaniisadihii hawsha waday!

15:17 Muxuu hadal caalami ah ayahay. Laakiin sidoo kale “weedha doorasho” ku xusuuso “dhammaan dadkii aan Yuhuudda ahayn magacooda lagu dhawaaqay (cf. Daanyeel. 9:19). Waxa ay muujhinaysaa nooc caabudaad oo lagu waayo arkay sida laga heli karo (cf. LXX ee Sharciga Ku Noqoshadiisa. 28:10; Sidoo kalena xusuusnow Ishacyaah. 63:19; Yeremyaah. 14:9).

15:18 Kusoo darista dadka aan Yuhuudda ahayn waxa ay ahayd qorshaha Ilaah (cf. Galatiya. 3:26-29; Efesos. 3:3-6, sidoo kalena Mawduuc Gaar ah ka eeg 1:8). Macnaha badbaadadu waxa uu ku iman lahaa tafiirtii Daa’uud sida laga heli karo (cf. aayadda. 16; II Boqorrada. 6:33).

15:19 Yacquubkan gabogabadiisii.

15:20 Hagayaashan macnahoodu waa (1)hubsashada sida ay wehelnimada kaniisadaha kala duwani ay tahay iyo (2) hni waxba kama aysan beddelayn badbaadada shaqsi ahaaneed ee dadka aan Yuhuudda ahayn! Hagayaashan waxaa lagu wajahay labadaba Yuhuudda iyo kuwii diin-laawayaasha ahaa caabudaaddoodii xad-dhaafka ahayn sida ku jirta (cf. aayadda. 29; 21:25).

Sharciyadii Laawiyiinta waxaa loo bixiyey in lagu adkeeyo kala duwanaanshada (bulsho ahaan iyo diin ahaan)Yuhuudda iyo Kancaaniyiinta. Ujeedkoodu waxa uu ahaa is weheshi la’aan, laakiin halkan ujeeddadu waa ay ka duwan tahay oo waa ay ka soo hor jeeddaa. “Muhiimadahani” waxaa weeye in ay caawimaad ka gaystaan is weheshi dhex mara rumaystayaasha labda dhaqan ee kala duwan leh!

Waxaa jira kala duwanaansho u dhexeeya qoraallo basdan oo Giriig ah oo ku saabsan Maammulkan Nebiyada. Qaar waxaa ku jira labo shay, saddex shay, ama afar shay. Faallo buuxda oo ku saabsan midan waxa aay ka eegi kartaa Bruce M. Metzger’s *A Textual Commentary on the Greek New Testament*, bogagga. 429-434). Tarjumaadaha Ingiriisiga ugu badan waxa ay leeyihiin afar qaab oo kala duwan.



NASB, NRSV,

REB

“ka timid macsida”

NKJV, REV,

NET

“ka timid damaca galmada”

NJB

“ka timid guur aan xalaal ahayn”

Way adag tahay in si hubanti ah loo ogaado in xarrimiddan ay si toos ah ugu aaddan tahay

1. kuwa aan diinta haysan ficilladooda caabudaadda dareen ahaaneed (i.e., damaca)
2. Yuhuudda dareennadooda ku saabsan damaca (cf. Laawiyiintii 18; eeg F. F. Bruce, *Answers to Questions*, p. 43; NJB)

▣ **“waxa la ceejiyo, iyo dhiigga”** Mufasiriinta qaarkood waxa ay kuwan qaarkood ku xidhiidhiyaan sharcyadii Muuse (cf. Laawiyiintii. 17:8-16). Waxaase macquul ah, si kasta ha ahaatee, “in dhiiggu” uu la xidhiidho wax-dilka, taasoo aad looga dhex garan karo qoraalladii Muuse shexdooda.

15:21 Aayaddan macnaheedu waxaa weeye

1. in la eego xeerka in Tawreed la baray dadkii aan Yuhuudda ahayn meel kastoo ay degaanka ka degganaayeen ama
2. maaddaama ay Yuhuuddu degaannada oo dhan ku noolayd, in akhlaaqdooda la dhawro si ay si firfircooni leh wacdiga ugu sii wadaan. (cf. II Korintos. 3:14-15)

NASB (UPDATED) TEXT: 15:22-29

²²Kolkaasay la wanaagsanaatay rasuulladii iyo waayeelladii iyo kiniisaddii oo dhan inay iska dhex doortaan niman ay Antiyokh ula diraan Bawlos iyo Barnabas, kuwaas oo ahaa Yuudas oo la odhan jiray Barsabaas iyo Silas oo ahaa niman madax ah walaalaha dhexdooda. ²³Markaasay qoreen oo iyagii la direen warqad leh, Annagoo ah rasuullada iyo walaalaha waayeellada ah waxaannu soo salaamaynaa walaalaha ka mid ah dadka aan Yuhuudda ahayn oo jooga Antiyokh iyo Suuriya iyo Kilikiya. ²⁴Waxaannu maqallay in kuwo annaga naga tegey hadallo idinku dhibeen, nafihiinnana rogayeen, kuwaasoo aannaan u amrin; ²⁵sidaas daraaddeed waxaa nala wanaagsanaatay, annagoo isku qalbi noqonnay, inaannu soo dooranno niman aannu idiinla soo dirno gacaliyayaashayadii Barnabas iyo Bawlos, ²⁶kuwaasoo ah niman naftooda u biimeeyey magicii Rabbigeenna Ciise Masiix aawadiis. ²⁷Sidaas aawadeed waxaannu soo dirnay Yuudas iyo Silas kuwaasoo iyaguna afka idiinka sheegi doona waxyaalahaas oo kale. ²⁸Waxaa la wanaagsanaatay Ruuxa Qoduska ah iyo annagaba inaannaan idin saarin culaab ka weyn waxyaalahan waajibka ah. ²⁹Waa inaad ka fogaataan waxa sanamyada loo sadqeeyo, iyo dhiig, iyo waxa la ceejiyo, iyo sinada. Kuwaas haddaad iska dhawrtaan si wanaagsan baad yeeli doontaan. Nabad gelyo.

15:22 Waftigan ujeedkiisu waxa uu ahaa midowga sida ku jirta (cf. aayadda. 23), ma aha in ay fulin amar bixiyaan.

☐ **“ahaa Yuudas oo la odhan jiray Barsabaas”** Hoggaamiyahan rumaysadka u leh, sida kuwo badaa badan ee Axdiga Cusub ku jira, waa kuwo aynnaan garanayn annagu. Meel kale isaga loogama xusin Axdiga Cusub dhexdiisa. Laakiin Ilaah ayaa isagayaqaab si fiican!

Waxaa hadda macquul in ninkani uu ahaa Yuusuf Barsabaas, kaasii oo ahaa mid ka mid ah musharrixiintii beddeli lahaa Yuudas Iskaariyoot sida ku jirta 1:23. Haddii ay sidaas tahay, waxa ay labaduba ahaayeen wiilashii ninkii lagu magacaabi jirahy Barsabaas.

☐ **“Silas”** Isagu, sida Barsabaas oo kale, ayuu hoggaamiye ka ahaa kaniisadda Yerusaaalem Waxaa isaga Bawlos ugu yeeraa Silfanuus wuxuuna beddeli lahaa Barnabas oo ahaa kan ku wehliya Bawlos safarka adeegga labaad. Waxaa macquul ah in Bawlos uu u dooranayey isaga in markii uu qof ku dacweeyo ama ku eedeeyo in (1) uu faafinazyo injiil ka duwan labo iyo tobankii xerta ahaa ama (2) uu bannaanka ka yahay is-weheshiga kaniisadda hooyada ah, uu Silas uga jawaabo eedayntooda iyo danahooda ay leeyihiin.

MAWDUUC GAAR AH: SILAS/SILFANUUS

Silas, ama Silfanuus, waxa uu ahaa ninkii uu Bawlos u doortay inuu raaco isaga safarkii labaad kaddib markii ay Barnabas iyo Yooxanaa Markos u laabteen Saybarus:

- A. Waxaa markii hore lagu carrabbaabay Falimaha Rasuullada 15:22 halkaasoo walaalaha dhexdooda looga yeedhay in uu nin taliye ah ka dhex yahay kaniisadda Yerusaaalem.
- B. Sidoo kale nebi ayuu ahaa sida ku jirta (cf. Fal 15:32).
- C. Wuxuu sidoo kale ahaa nin dhalasho Rooman ah leh sida Bawlos oo kale (cf. Fal 16:37).
- D. Isaga iyo Yuudas Barsabaas ayey Kaniisaddii Yerusaaalem u dirtay Antiyokh si ay u soo kor meeraan xaaladda (cf. Fal 15:22,30-35).
- E. Bawlos waxa uu kitaabka II Korintos. 1:19 ugu sheegayaa inuu yahay waday wacdiye injiilkaa ah.
- F. Goor dambde Butros ayuu qoraal ku caddeeyay sida ku jirta I Butros. (cf. I Butros. 5:12).
- G. Bawlos iyo Butros waxa ay isaga ugu yeeraan Silfanuus halka Luukos ku magacaabo Silas (qaabka luuqadda Aramaygga ee magaca Sawlos). Waxaa macquul ah in magaciisa Yuhuudigu ahaa Silas magaciisa Laatiinkuna ahaa Silfanuus (cf. F. F. Bruce, *Paul: Apostle of the Heart Set Free*, bogga. 213).

15:23 Warqadda ka timid golaha Yerusaaalem waxa ay ku socotay oo qura kaniisado gaar ah, oo sida cad ay Yuhuud badani qayb ka ahayd. Yacquub waxa uu taxan kaniisadaha ku muujinayaa in aysan ahayn in ay sharci u tahay kaniisadaha dadka aan Yuhuudda ahayn. Ujeedka warqaddu waxa ay ahayd oo qura ujeeddooyin is-weheshi iyo wacdinta injiilka ah ee ma aha hage dhaqan ama badbaado ku saabsan!

Miyaad rumaystayaashiinna cusubi ee casrigani iska ilaalisaan hilibiyada aan runta ahayn? Eeg

1. Manfred Brauch, *Abusing Scripture*, cutubka 7, “The Abuse of Context: Historical Situation and Cultural Reality,” Bogagga. 202-249
2. Gordon Fee, *Gospel and Spirit*
3. *Hard Sayings of the Bible*, “How Kosher Should Christians Live?,” bogagga. 527-530 and “To Eat or Not to Eat,” bogagga. 576-578

Kuwan waa qodobbo caawimaad leh. Waa wax aad raaxo u leh in la aqriyo war-bixin kale oo ku saabsan Masiixiyiintii kale sidii ay u la hardamayeen arrimahan. Qoraalladoodu waxa ay rumaystayaashii kale siiyeen fursad ay uga fakaraan uguna noolaadaan nolol u qalanta nuurka ay haystaan. Midnimo weehye, ee ma aha isku ekaan, waana furaha caafimaadka leh, koritaanka, iyo adeegga-weyn ee kaniisadaha.

▣ **“Kilikiya”** Meeshani waa halkii uu Bawlos deggaanaa (cf. 22:3).

15:24 Aayaddani waaxa ay muujinaysaa in kaniisaddii ku tiil Yerusaaalem ay ogaatay in qaar xubnaheedii ka mid ah oo aan amar u lahayn ay wax ku maammulaan (cf. aayadda. 1), ay (1) u safrayeen in ay u tagaan hawlaha kaniisadahan iyo (2) oo ay aqbalaad ka dalbadaan si waafaqsan Sharcigii (cf. aayadda. 1).

Ereyga falka ah ee (*anaskouz*) ee la adeegsaday ay tahay weedh militari oo xooggan oo halkan oo qura lagaga adeegsaday Axdiga Cusub dhexdiisa toosoo ku wajahan magaalo damac weyn.

15:25

NASB “Isku maan noqonayno”

NKJV “being hal ujeeddo ahaanaya”

NRSV, NJB “Waxaan go’aansannay in aan hal urur ahaanno”

TEV “Waan wada kulannay oo waannu isku raacnay”

Midnimadan rumaystayaasha dhexdooda ah waxa ay ahayd dabeecadda lagu garanayo la joogista Ruuxa Qudduuska ah (cf. aayadda. 28). Ogdoonow in in tan macnaheedu uusan ahayn in aanay dood adagi dhicin ama aan fikrado la is dhaafsan, laakiin dood iyo hadallo calculus kaddib ayaa rumaystayaashu ajende mid ah gaadheen.

Kulankan fiqi ahaaneed ee lagu midoobay ayaa loo baahday in loo daabaco kuwa dibadda si xiisadda murankan aanay u dhicin mar kale iyo mar kale. Markan kaniisadda Yerusaaalem waxay qaadatahy u istaagiod guud ahaaneed oo ah sidii injiilka loo gaadhsiiin lahaa dadka aan Yuhuudda ahayn!

15:26 Bawlos iyo Barnabas maysan wadaagin oo qur guulaha, laakiin sidoo kale dhibaatooyinkii shaqadii adeegga. Dayacaaddani ma ahayn dareen gudbaya, laakiin wuxuu ahaa mid si joogto ah loola kulmayo.

15:28 “Ruuxa Qoduuska ah iyo annagaba” Kulankan cajiibka ah wuxuu ahaa mid uu Ilaah dhex joogo. Waxa uu ku muujiyey doonistiisa shirkan dhexdiisa! Ruuxa Qudduuska ah ayuu ahaa kii soo saaray midnimada. Meeshan labada arrimood kitaabiga ah ayaa lagu soo koobay—kuwaasoo ah hawsha Ilaah iyo jawaabta qaaska ah ee laga doonayo aadanaha. Ogsoonow waxaa jiray tanaasul; dhan walbana wax buu helay. Nimcada keligeed iyo rumaysadka keligii, injiilkii ayaa ku xoogaystay, laakiin dhaqankii Yuhuudda waa la xushmeeyay. Mawduuc Gaar ah: Shaqsinimada Ruuxa Qudduuska ah ka eeg: 1:2.

▣ **“waxyaalahan waajibka ah”** Kuwani lama ay xidhiidhaanbadbaado shaqsi ahaaneed, laakiin wehelnimo ka dhexaysa Yuhuudda rumaysadka leh iyo kuwa aan Yuhuudda ahayd ee rumaysadka leh ee kaniisadaha degaanka.

15:29 Tan macnaheedu waxaa weeyaan in dadkii aan Yuhuudda ahayn ay gebi ahaanba burburiyaan sanamyadoodii hore. Xorriyadda iyo masuuliyadda Masiixigu waa ay adag tahay in la is le’ekaysiiyo, laakiin waa in ay ahaadaan sidan ku jirta (cf. Roooma. 14:1-5:13; I Korintos. 8:1-13; 10:23-28). Sanam-caabudayaashan wax caabudistoodii hore waxaa ku jiray saddexdan shay ee laga saaray! Waxyaabahan waajibka ah waxaa lagu kala

diwaan geliyey saddex qoraal oo kala duwan oo Giriig ah. Su'aasha runta ahi waxa ay tahay maxay la xidhiidhaan?

1. shayda loo bixinahyo sanamyada waxa ay tilmaamayaan hilib (cf. I Korintos. 8; 10:23-33)
2. dhiiggu waxa uu noqon lahaa labo uun middood
 - a. hilib aan xalaal ahayn
 - b. dil ku talo gal ah
3. waxyaabaha la ceejiyey waxa ay la xidhiidhi karaan qaababka aan xalaasha ahayn ee lagu qalayo xoolaha, oo tilmaamayo in labada hore ay sidoo kale la xidhiidhaan dareennada Yuhuudda ee xagga cunnada (i.e., Laawiyiintii 11)
4. sinadu waxa ay la xidhiidhay
 - a. ka qayb-galk caabudaadaha kuwa sanamka caabuda (sida cunnada ay bixiyaan)
 - b. Sharciyadii Laawiyiinta ee Axdigii Hore ee ka soo hor jeeda galmada xaaraanta ah (cf. Laawiyiintii. 17:10-14, see F. F. Bruce, *Answers to Questions*, bogga. 43)

Waxyaabahan lagama maarmaanka dhammaantood lama ay xidhiidhaan badnaado, laakiin waxa ay tilmaamayaan is-weheshi kaniisado isku dhaf ah iyo fidinta fursadaha wacdinta Yuhuudda. Ka eeg F. F. Bruce, *Answers to Questions*, bogagga. 80-81.

MAWDUUC GAAR AH: XORRIYADDA MASIIXIGA vs. MASUULIYADDA MASIIXIGA

- A. Cutubkani waxa uu eegayaa isu dheelli tirka jimaynta xriiyadda iyo masuuliyadda Masiixiga. Macnaha unugga rasmiga ah ee ku jira waa Falimaha Rasuullada 15:13.
- B. Dhibaataada cutubkan sababta u ah waa xiisadda ka aloosnayd rumaystayaasha aan Yuhuudda ahayn iyo kuwa Yuhuudda ah ee kaniisadda Rooma. Intii aysan badbaadin ka hor Yuhuuddii waxa ay u weecdeen xagga sharciga kuwii sanamyada caabudi jirayna xagga damacyada jidhka. Xusuusnow, cutubkan waxaa lagu jahaynayaa kuwa raacsan Ciise Masiix. Cutubkani lama uu xidhiidho ama kuma saabsana rumaystayaal sinaysanaya (cf. I Korintos. 3:1). Ujeeddada ugu muhiimsan waa loo sharraxay labada kooxda. Waxaa jirtay halis ku soo fool lahayd labada dhinacba. There is danger in the extremes on both sides. Go'aanku ma ahayn mid ruqsad siinaya kuwa sharciga ama kuwa dhexdhexaadka.
- C. Rumaystayaashu waa in ay ka taxaddaraan in aysan fiqigooda ama dhaqankooda ka dhigin mid sal u ah ama laga doonayo rumaystayaasha kale (cf. II Korintos. 10:12). Rjumaystayaashu waa in ku dhex socdaan iftiinkooda ay haystaan iyo in ay fahmaan in fiqigoodu uusan ahayn Ilaah fiqigiisa. Rumaystayaasha waxaa weli saamayn ku leh dembiga. Waa in aan isku dhiirri gelinnaa, isku boorrinnaa, oo midkeenba uu midka kale ka baraa Qorniinnada, sababihii iyo wixii la soo maray, laakiin had iyo goor jacayl. Qofka wax kasta oo uu yaqaan wax uun baa ka maqan (cf. I Korintos. 13:12)!
- D. Qofka fikirkiisa iyo ujeedooyinkiisa ku wajahan Ilaah ayaa fure u noqda oo saameeya ficilladiisa. Masiixiyiinta waxay istaagi doonaan Mariixa hortiiisa oo wuxuu ku xukumi doonaa sidii uu midba midkii kale ula dhaqmay (cf. aayadaha. 10,12 iyo II Korintos. 5:10).
- E. Martin Luther wuxuu yidhi, "Qoka Masiixiga ahu wuxuu sayid u yahay dadka oo dhan, isagoo aan midna u taagnayn; qofka masiixiga ahu waxa uu si waajib ah adeege ugu yahay dadka oo dhan, oo dadka isagoo dadka oo dhan u taagan." Runta baybalku waa mid had iyo jeer wada socota oo aan kala leexad lahayn.
- F. Maaddadan adag laakiin muhiimka ah waxaa lagu adeegsaday unugga macnaha rasmiga ah leh sida ku jirta Rooma 14:1-15:13 iyo sidoo kale sida ku jirta I Korintos 8-10 iyo kolosay 2:8-23.
- G. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa loo baahan yahay in la sheego in jamac-noqoshada rumaystayaashu aysan ahayn shay xun. Rumayste kasta waxa uu leeyahay xoog iyo taagdarro

labadaba. Mid kastaa hadduu nin yahay iyo hadday naag tahayba waa in uu ku socdaa iftiinka uu haysto, oo uu mar kasta iftiin badan ka raadsado Ruuxa Qudduuska ah iyo Kitaabka. Marka aannu xiisaddan meesha mugdiga ah iftiinka muraayad lagaga arkayo ee (I Korintos. 13:8-13) waa in qofku uu jacal ku socdaa (aayadda. 15), iyo nabad (aayadaha. 17,19) oo uu dhaqan jacayl wanaagsan yeeshaa.

H. Magacayada “xoogganaan” iyo “taagdarro” ee uu Bawlos ku tilmaamayo kooxahan waa mid innaga tusaale inoo ah. Tani ma ahayn mid uu Bawlos si dhab ah ugu talo galay. Labada kooxba waxa ay ahaayeen rumaystayaal daacad ah. Waa in aynaan isku dayin in Masiixiyiinta kale ahaadaan sida aan nahay. Wuxuu midkeenba midka kale ku aqbalayaa Masiixa awgii!

I. Doodda ugu weyn waxa ay noqonaysaa

1. in midkeenba midka kale oggolaado maxaa yeelay Ilaahba wuxuu oggol yahay Masiixa (cf. 14:1,3; 15:7);
2. in uusan midkeenba midka kale xukumin maxaa yeelay Masiixa oo qudha ayaa ah Sayidkeenna iyo xaakinkeenna (cf. 14:3-12);
3. jacaylku wax badan buu ka muhiimsan yahay xorriyadda shaqsi ahaaneed (cf. 14:13-23);
4. raac rusaalaha masiixa oo xuquuqdaada kuwa kale u sii wax barashadoopda iyo in ay ku wanaagsanaadaan (cf. 15:1-13).

▣ **“if”** Naxwe ahaan middani ma aha jumlad xaalad ku xidhan.NJB-gu wuxuu odhanayaa “iska ilaaliya waxyaabahan, oo wax xaq ah ayaad samayn doontaan.”

▣ **“Farewell”** Kani waa fal tegat oo amar ah oo loo adeegsaday soo xidhitaan guud oo xoogga iyo caafimaadka ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 15:30-35

³⁰Sidaas daraaddeed, kolkii la diray ayay waxay yimaadeen Antiyokh; oo markay dadkii badnaa isu ururiyeen dabadeed waxay u dhiibeen warqaddii. ³¹Markay akhriyeenna ayay waanadii ku farxeen. ³²Yuudas iyo Silas, iyagoo qudhooduna nebiyo ahaa, ayay hadallo badan walaalihii ku waaniyeen oo ku xoogeeyeen. ³³Oo markay muddo joogeen dabadeed ayaa walaalihii nabad ugu direen kuwii iyagii u soo diray. ³⁴Iaakiin waxaa Silas la wanaagsanaatay inuu meeshaas sii joogo. ³⁵Iaakiin Bawlos iyo Barnabas ayaa Antiyokh sii joogay, oo waxay kuwo badan oo kale la barayeen oo kula wacdiyeyeen hadalka Rabbiga.

15:30 Kani waa kulan kale oo ay kaniisaddu qabatay. Waxa uu muujinayaa isku keenidda kaniisadda degaanka.

15:31 Kulankan labaad ee kaniisadda (i.e., kaniisaddii aan Yuhuudda ahayn ee Antiyokh) uma aysan arag muhiimadahan wax diidmo ama digniin ah.

15:32 Aayaddani waxa ay qeexaysaa oonka loo qabo wax-sii-sheegidda Axdiga Cusub. Marka koowaad waa wacdintsa injiilka iyo dhaqan gelintiisa; kan yaqaan, dabcan waa caddayn Axdiga Cusub ah oo ka hadlaysa kulammada waaweyn! Mawduuc gaar ah: Waxsii Sheegidda Axdiga Cusub ka eeg 11:27.

15:33 “nabad” Tarjumaaddan NASB xirfad dheeraad ayey u baahan tahay. Waxaadse tarjumaadda oo cad ka eegan kartaa NKJV ama NRSV si aad si cad ugu tarjumato aayaddan. Tan waxaa ka muuqanaya ereyga nabad galyeynta ee luuqadda Cibraaniga ee, *Shalom* (i.e., “nabad”, BDB 1022). Tani waa mid si buuxda u muujinaysa caawimaadda buuxda ee kaniisadda Yerusaleem iyo hoggaankeeda.

15:34 Aayaddani kuma ay jirto qoraallada Giriigga ee P74, Ⓝ, A, B, E, ama Tarjumaadda Laatiinka ee Vulgate. Sidoo kale kuma ay jiraan NRSV, TEV, NJB, iyo NIV. Waxa ay ku jirtaa qoraallada muhiimka ah ee Giriigga ee (i.e., C iyo D). Dabcan asal ahaan ka mid ma aha Falimaha Rasuullada. UBS4 waxa uu ku jiris la'aanteed ku tilmaamayaa “xaqiiq” (A).

15:35 Aayaddani waxa ay muujinaysaa wacdiyeyashii iyo macallimiintii kale ee qarnigii koowaad uusan jiiinkeennan casrigu waxb a uga ogayn. Axdiga Cusubi si xulasho leh ayuu uga faallooda nololsha Rasuullada kale iyo adeegayaasha kale iyo wacdiyeyasha kale. Ilaah baa garmaya! Kitaabka Falimaha Rasuulladu diiradda saari tariikh nololeed qof gaar ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 15:36-41

³⁶Maalmo dabadeed Bawlos ayaa wuxuu Barnabas ku yidhi, Hadda aynu ku noqonno oo booqanno walaalaha jooga magaalo kasta oo aynu hadalka Rabbiga ku wacdinay inaan soo aragno siday yihiin. ³⁷Barnabas wuxuu doonayay inay kaxaystaan Yooxanaa oo la odhan jiray Markos. ³⁸laakiin Bawlos waxaa la wanaagsanaatay inayan kaxaysan isaga kaasoo iyaga kaga tegey Bamfuliya oo aan shuqulkii iyaga u raacin. ³⁹Waxaa dhacay khilaaf weyn; sidaas daraaddeed way kala tageen, markaasaa Barnabas kaxaystay Markos, oo wuxuu u dhoofay Qubrus; ⁴⁰laakiin Bawlos wuxuu doortay Silas. markaasuu baxay isagoo ay walaalihii ku ammaana gelinayaan nimcadii Ilaah. 41Oo wuxuu dhex maray Suuriya iyo Kilikiya isagoo kiniisadihii xoogaynaya.

15:36 “aynu ku noqonno” Ujeedkii Bawlos iyo Barnabas ayey ahayd in ay dib u laabtaan si ay u soo xoojiyaan kanoosadaha cusub ee ay safarkoodii koowaad soo bilaabeen. Ogsoonow, maysan jirin wax caddayn ah oo ku saabsan hawshan si la mid ah sida kii koowaad (cf. 13:2).

15:38 “Bawlos waxaa la wanaagsanaatay inayan kaxaysan” Kani waa fal tegay oo toosan. Si cad ayuu bawlos u sii waday in uu qeexo ama caddeeyo sida uusan u doonayn.

▣ “kaasoo iyaga kaga tegey” Sida xaqiiqda ah sababtii iyo Yooxanaa iyo Markos uga tageen hawlgalkii koowaad lama hubo (cf. 13:13).

15:39 “Waxaa dhacay khilaaf weyn; sidaas daraaddeed way kala tageen” Macnaha salka ah ee weedhan waa “afayn,” meaning “u afayn sida sakiinta oo kale.” Waxaa loo adeegsanayaa si aan diidmo ahayn sida ku jirta Cibraaniyada. 10:24. Ha ah waxaa sidoo kale lagu adeegsaday Falimaha Rasuullada 17:6 iyo I Korintos. 13:5. Sida runta ah khilaaf ayaa ka dhex dhacay!

▣ “markaasaa Barnabas kaxaystay Markos, oo wuxuu u dhoofay Qubrus” Markan waxaa labo koox oo adeegayaal ah.

15:40 “Bawlos wuxuu doortay Silas” Bawlos hoggaamiye kale oo cusub ayuu ka dhex doortay kaniisadda Yeruusaalem.

▣ “isagoo ay walaalihii ku ammaana gelinayaan nimcadii Ilaah” Tan waxaa ka mid ahaan lahaa salaad Ilaah bari oo qaas ah (cf. 6:6; 13:3 14:26; 20:32). Waxa ay tilmaamaysaa kaniisadda oo dhan ee ma aha koox la xushay

15:41 “Kilikiya” Sababatii iyo sidii ay kaniisadahani ku bilowdeen lama hubo. Sida macquulka ah Bawlos qudhiisa ayaa bilaabay intii uu sannadihiisii aammuska ku guda jiray ee Tarsus dhexdeeda. Kilikiya waa magaaladii hoyga u ahayd Bawlos.

▣ “kaniisadaha” Ka eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11.

SU'AALO FALAQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sababtii ayuu cutubkani muhiim u yahay?
2. Waa kuwama Masiixiyiinta Yuhuudda ahu?
3. Sababtee buu Yacquub fikirkiisu saa awood ugu yeeshay?
4. Hoggaamiyeyaashu waa ayo?
5. Miyey xadaynada aayadaha 28-29 tilmaamayaan badbaado mise isweheshi?

FALIMAHA RASUULLADA 16

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Timoteyos oo raacay Bawlos iyo Silas	Timoteyos oo ku biiray Bawlos iyo Silas	Timoteyos oo raacay Bawlos	Timoteyos wuxuu raacay Bawlos iyo Silas	Ikoniyon: Bawlos wuxuu hawl geliyay Timoteyos 15:41-16:3
16:1-5	16:1-5	16:1-5	16:1-5	16:4 16:5
Bawlos oo riyo ku arkay nin reer Makedoniya ah	Yeedhitaankii Mekakedoniyanka	Dhexmaritaankii Aasiyada Yar ilaa Taroo'as	Taroo'as: riyaadii Bawlos	Ka tallaabistii Aasiyada Yar 16:6-8 16:9-10
16:6-10	16:6-10	16:6-10	16:6-10	
Rumaysad yeelashadii Ludiya	Ludiya oo lagu baabtiisay Filiboy	Bawlos iyo Silas oo jooga Filiboy	Filiboy: Rumaysad yeelashadii Ludiya	Imaatinkii Filibi 16:11-15
16:11-15	16:11-15	16:11-15	16:11-15	
Xabsi ku galistii Filibi	Bawlos iyo Silas oo laxidhay		Xabsigii Filiboy	Xidhitaankii Bawlos iyo Silas 16:16-18 16:19-24
16:16-24	16:16-24	16:16-18 16:19-24	16:16-22a 16:22b-24	
16:25-34	Ninkii reer Filiboy ee xabsiga hayay wuu badbaaday	16:25-34	16:25-28	Sii dayntii mucjisada ahayd ee Bawlso iyo Silas 16:25-28
16:35-40			16:29-30 16:31-34	16:29-34
	Bawlos wuxuu diiday inuu si qarsoodi ah u tago			
	16:35-40	16:35-40	16:35 16:36 16:37 16:38-40	16:35-37 16:38-40

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 15:36-16:40

- I. SOCDAALKII ADEEGGII LABADD (15:36-18:23)
 - A. Adeeggan socdaalkiisi wuxuu qaatay mid ka badan kii hore, waxa suura gala inuu ahaa 3-4 sanadood.
 - B. Ugu horrayn waxay diiradda saartay Makedoniya iyo Akiya, kuwaasoo ah Giriigga casriga ah.
 - C. Brief Outline
 1. Barnabas iyo Bawlos oo kala qaybsaday, 15:36-40 (ku dagaallankii Yooxanaa Markos)
 2. Suuriya iyo Kilikiya, 15:41 (goorma iyo sida ay ku bilaabmeen kaniisadahani lama hubo.)
 3. Lustara Derbe, 16:1-5 (Timoteyos oo kusoo biiray kooxda.)
 4. Troo'as (Troy), 16:6-10 (Bawlo arkay riyo inuu ku laabto galbeedka.)
 5. Filiboy, 16:11-40
 6. Tesaloniika, 17:1-9
 7. Beriya, 17:10-14
 8. Athens, 17:15-34
 9. Korintos, 18:1-17
 10. ku laabashada Antiyokhdii Suuriya, 18:18-22

KALKAALIYAYAASHII BAWLOS

- A. Yooxanaa Markos (Yooxanaa waa magac Yuhuudi ah. Markos waa magac Roomaan ah, Fal 12:25.)
 1. Waxa uu ku koray Yerusaaalem. Hooyadiis gurigeeda waxa lagu sheegay Fal 12:12 isagoo ahaa meeshii kaniisaddii ugu horraysay ee Yerusaaalem ay ugu kulmi jireen salaadda.
 2. Kuwo badan ayaa sheegay in gurigiisu uu ahaa inuu gurigiisa laga arki karay Cashadii Rabbiga iyo in ninka qaawan ee lagu sheegay Markos 14:51-52 uu ahaa Yooxanaa Markos. Labadaniba waa suuro gal laakiin waa male.
 3. waxa u ahaa Barnabas inaadeerkiis (cf. Kolosay. 4:10).
 4. waxa uu la socday Barnabas iyo Bawlos (cf. Fal 13:5).
 5. wakhti hore ayuu kooxda ka tegay waxaanu ku laabtay Yerusaaalem (cf. Fal 13:13).
 6. Barnabas ayaa damcay inuu kusoo daro socdaalka labaad, laakiin Bawlos baa diiday (cf. Fal 15:36-41).
 7. Mardabne ayaa Bawlos iyo Yooxanaa Markos heshiyeen (cf. II Timoteyos. 4:11; Filemon 24).
 8. Waxa uu noqday saaxiib ka ag dhow Butros (cf. I Butros 5:13).
 9. Waxa la sheegayaa inuu qoray Injiilka magaciisa ku lifaaqay inuu yahay wacdimihii Butros ka sameeyay Rooma. Injiilka Markos waxa uu koobsanayaa ereyo Laatiin ah oo ka badan kitaabada kale

ee Axdiga Cusub waxaana loo qoray Roomaanka. Tani waxay ka imanaysaa Papiyas kii Hirabolis, sida uu qoray Eusebius ‘ *Ecccl. His.* 3.39.15.

10. Dhaqanku wuxuu sheegayaa inuu iskaashi la sameeyay aasaaskii kaniisadda Iksendariya.

B. Silas

1. Falimaha Rasuullada dhexdooda waxa loogu yeedhay Silas iyadoo Warqadaha dhexdoodana lagu magacaabay Silfanas.

2. He, like Barnabas, was a leader in the Jerusalem Church (cf. Acts 15:22-23).

3. waxa uu ka ag dhowaa Bawlos (cf. Fal 15:40; 16:19ff; 17:1-15; I Tesaloniika. 1:1).

4. Sida Barnabas iyo Bawlos ayuu ahaa nebi (cf. Fal 15:32).

5. waxa lagu sheegay rasuul (cf. I Tesaloniika. 2:6).

6. Sida Bawlos ayuu ayuu haystay dhalasho Roomaan ah (cf. Fal 16:37-38).

7. Sida Yooxanaa Markos, waxa uu ka ag dhowaa Butros, waxaana xitaa suuro gala inuu ka mid ahaa culimada (cf. I Butros 5:12).

C. Timoteyos

1. Magaciisa macnihiisu waa “ka Ilaah sharfa.”

2. Waxa iska dhalay hooyo Yuhuuda iyo aabbe Giriiga waxaanu ku noolaa Lustara. Tarjumaadda Laatiinka ee tafsiirka Origen ee Rooma 16:21 waxa uu ku sheegayaa inuu Timoteyos kasoo jeeday Derbe. Waxa suurto gala in middan lagasoo qaatay Fal 20:4. Waxa rumaysadka Yuhuudda ku barbaariyay hooyadiis iyo ayaydiis (cf. II Timoteyos. 1:5; 3:14-15).

3. Waxa laga dalbaday inuu kusoo biiro Bawlos iyo Silas socdaalkii adeeggooda labaad (cf. Fal 16:1-5). Waxa lagu ansixiyay waxsii sheegid (cf. I Timoteyos. 1:18; 4:14).

4. Waxa guday Bawlos si uu ula shaqeeyo Yuhuudda iyo Giriigga labadaba.

5. Waxa loo sharaxay inuu Bawlos u noqdo kalkaaliye. Waa magaca ugu badan la sheegay inuu ahaa kalkaaliyaha Bawlos (17 jeer 10 waraaqood dhexdooda, cf. I Korintos. 4:17; 16:10; Filiboy. 1:1; 2:19; Kolosay. 1:5; I Tesaloniika. 1:1; 2:6; 3:2; I Timoteyos. 1:2,18; 4:14; II Timoteyos. 1:2; 3:14-15).

6. Waxa lagu sheegay “rasuul” (cf. I Tesaloniika. 2:6).

7. Labo ka mida saddexda warqadood ee wadaadnimada ayaa isaga loo tiiriyay.

8. Waa ka ugu danbeeya ee lagu xusay Cibraaniyada 13:23.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 16:1-5

¹Oo wuxuu kaloo yimid Derbe iyo Lustra; oo bal eega, halkaas waxaa joogay nin xer ah oo la odhan jiray Timoteyos, oo ahaa Yahuudiyad rumaysan wiilkeed, aabbihii wuxuu ahaa Gariig. ²Isagana walaalihii Lustra iyo Ikoniyon joogay baa u marag furay. ³Bawlos wuxuu doonayay inuu isagu raaco; markaasuu waday oo guday, Yuhuudda meelahaas joogtay darteed; maxaa yeelay, kulligood way wada ogaayeen in aabbihii uu Gariig ahaa. ⁴Oo intay magaalooyinka dhex marayeen, waxay u dhiibeen amarradii rasuulladii iyo waayeelladii Yerusaaalem joogay soo amreen, inay dhawraan. ⁵Haddaba kiniisadihii iimaankay ku xoogooben, oo maalin kastaba tiradoodu waa kordhaysay.

16:1 “Derbe iyo Lustra” magaalooyinkani waxay ku yaallaan qaybta koonfureed ee gobolkii Roomaanka ee Galatiya (Turkiga maanta). Bawlos waxa uu booqday goobtan socdaalkiisi adeeg ee hore (aayadda 14).

☐ **“halkaas waxaa joogay nin xer ah”** Luukos waxa uu adeegsanayaa ereyga *idou* si uu hordhac ugu sameeyo weedhan. Waxa ay ahayd si loo tusiyo waxa la adkaynayo. Timoteyos waxa uu noqon doonay xubin muhiim ka ah adeega Bawlos.

☐ **“oo ahaa Yahuudiyad rumaysan wiilkeed, aabbihii wuxuu ahaa Gariig.”** II Timoteyos 1:5 waxa aan ka baranaynaa in ayaydiis ay sidoo kale ahayd Yahuudiyad ama mid haysata iimaanka Yuhuudda. Ayaydiis magaceedu wuxuu ahaa Lo’is hooyadiisna waxa la odhan jiray Iyuniis. Hooyadiis iyo ayaydiis, waxa ay noqday rumaystayaal adeegii Bawlos ee koobaad.

16:2 “baa u marag furay” waa fal aan dhammays tirnayn oo mafcuulku soo horreeyo. Dadku si fiicanbay ugu marag fureen Timoteyos marar badan. Mid ka mid ahaa waxyaalaha laga rabo hoggaamiyaha kaniisadda ayaa ahaa “inaanu lahayn eed,” oonay eedaynayn rumaystayaasha iyo kuwo aan rumaysadka lahayn labaduba (cf. I Timoteyos. 3:2, 7, 10).

▣ **“Lustara joogay”** Timoteyos wuxuu ku noolaa Lustara. Si kastaba ha ahaatee, qoraal gacmeedyada Giriigga kuwo ka mida oo ah Fal 20:4 (iyo Origen qoraalladiisa) ayaa sheegaya inuu ku noolaa Derbe.

16:3 “Bawlos wuxuu doonayay inuu isagu raaco” fiiro u yeelo Bawlos oo u yeedhay Timoteyos. Tani may ahayn doorashada Timoteyos oo keliya (I Timoteyos 3:1). Macnuhu waxa uu tusinayaa in Timoteyos uu noqonayo Bawlos kalkaaliyihisa ama masuul.

▣ **“markaasuu waday oo guday”** Bawlos wuxuu rabay inuu awoodi karo inuu la shaqeeyo Yuhuudda (cf. I Korintos. 9:20; Fal 15:27-29). Middan lagalama hadlayn Yuhuudda maxaa yeelay

1. natiijoyinkii Guddiga Yeruusaalem (cf. aayadda. 15)
2. waxa uu diiday inuu gudo Tiitos (cf. Galatiya. 2:3)

Si kastaba ha noqotee, falka uu Bawlos ku tallaabsaday arrinta wareer ayuu ku keenay! Qaabka Bawlos ee ah in la sameeyo si cid wax loogu guulaysto (cf. I Korintos. 9:19-23) ayaa dadka iyo badbaadooda siinaya muhiimadda!

▣ **“aabbihis uu Gariig ahaa.”** falka aan dhammayska tirnayni waxa uu tusinayaa inuu dhintay.

16:4 Bawlos iyo Silas waxa lagu wargeliyay (fal aan dhammaystirnayn oo wax tusmaynaya) natiijada Gudigii Yeruusaalem (cf 15:22-29). Xusuusnow waxyaalahaan “asaasiga ahi” waxay ahayd labo ujeeddo.

1. is weheshiga kaniisadaha dhexdooda
2. wacdinta Yuhuudda (sidiu uu ahaa gudniinka Timoteyos)

16:5 markale ayaa Luukos soo koobayaa hadallada (cf. 6:7; 9:31; 12:24; 16:5; 19:20; 28:31). Bawlos waxa uu lahaa qalbi ah xer ka dhigis (cf. 14:22; 15:36; 15:5). Wacdin aan wadanin xer ka dhigis waxa ay fawdaynaysaa Adeegga Wayn (cf. Matayos. 28:18-20) waxaana ka dhalanaya “soo ridis ruuxi ahaaneed”!

▣ **“kaniisadaha”** eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11.

NASB (UPDATED) TEXT: 16:6-10

⁶Markaasay waxay dhex mareen dhulka Farugiya iyo Galatiya iyagoo Ruuxa Qoduuska ahu u diiday inay hadalka kaga dhex hadlaan Aasiya, ⁷oo markay Musiya u dhowaadeen waxay isku deyeen inay Bituniya galaan; laakiin Ruuxa Ciise uma oggolaan; ⁸markaasay soo dhaafeen Musiya oo waxay yimaadeen Taroo'as. ⁹Oo habeennimo ayaa Bawlos wax riyo ku arkay. Waxaa taagnaa nin reer Makedoniya ah isagoo ka baryaya oo leh, Makedoniya kaalay oo na caawi. ¹⁰Oo markuu riyadii arkay dabadeed markiiba waxaannu doonnay inaannu Makedoniya tagno, taasoo nala noqotay in Ilaah noogu yeedhay inaannu iyaga injiilka ku wacdinno.

16:6 “waxay dhex mareen dhulka Farugiya iyo Galatiya” halkan Luukos waxa uu uga hadlayaa si la xidhiidha cirqiga iyo luqadaha isagoon ka hadlaynin gobol siyaasadeedyadii Roomaanku siday ukala qaybsanaayeen. Hadalkan duurxulka ahina waxa uu sheegayaabaa laga yaabaa xadadkii u dhexeeyay qabiilooyinkan.

▣ **“u diiday”** waa fal wakhti tegay ah oo mafcuulku soo horreeyo. Waa eray caan ku dhex ah Sabtuujantiga iyo Axdiga Cusub. Ruuxu waxa uu ku lug lahaa wax qabadka iyo go’aanada kaniisaddii ugu horraysay (cf. 2:4; 8:29,39; 10:19; 11:12,28; 15:28; 16:6,7; 21:4; Rooma. 1:13). Kaniisadda casriga ahina waxa ay wayday wanaaggii ay lahayd kaniisaddii ugu horraysay oo kale.

▣ **“kaga dhex hadlaan Aasiya”** tani waxa ay sheegaysaa gobolkii Roomaanka ee Aasiyada Yar, taasi oo ahayd galbeedka Turkiga maanta jira.

16:6,7 “Ruuxa Quduuska ah. . Ruuxa Ciise” wax ku saabsan shakhsiyadda Ruuxa ka eeg, Mawduuca Gaarka ah 1:2. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: MASIIXA IYO RUUXA

Waxaa kala jira isbeddello u dhexeeya shaqada Ruuxa iyo Shaqada Wiilka. G. Campbell Morgan wuxuu sheegay in magaca ugu wanaagsan ee Ruuxu uu yahay “Kan kale ee ah Masiixa.” Kuwan soo socda waxa ay sawir is barbar dhigeed ka bixinayaan shaqada iyo magaca Wiilka iyo ruuxa.

1. Ruux loogu yeeray, “Ruuxa Ciise” ama in ay isku qeexid yeeshaan (cf. Rooma. 8:9; II Korintos 3:17; Galatiya. 4:6; I Butros. 1:11).
2. Iyadoo labadaba isku qaabab loo sheegayo
 - a. “runta”
 - 1) Ciise (Yooxanaa 14:6)
 - 2) Ruuxa (Yooxanaa 14:17; 16:13)
 - b. “Qariin ama u doode”
 - 1) Ciise (I Yooxanaa 2:1)
 - 2) Ruuxa (Yooxanaa 14:16,26; 15:26; 16:7)
 - c. “Qudduus”
 - 1) Ciise (Luukos 1:35; 4:34)
 - 2) Ruuxa (Luukos 1:35; 4:34)
3. Labaduba waxay dhex deggan yihiin kuwa rumaysadka leh dhexdooda
 - a. Ciise (Matayos. 28:20; Yooxanaa. 14:20,23; 15:4-5; Rooma. 8:10; II Korintos. 13:5; Galatiya. 2:20; Efesos. 3:17; Kolosay. 1:27)
 - b. Ruuxa (Yooxanaa 14:16-17; Rooma. 8:9,11; I Korintos.3:16; 6:19; II Timoteyos. 1:14)
 - c. Iyo sidoo kale Aabbaha (Yooxanaa 14:23; II Korintos 6:16)

16:7 “Musiyaa” waxa ay ahayd goob qabiil deganayeen oo ku taalla woqooyiga galbeed ee Gobolkii Roomaanka ee Aasiyada Yar. Waxa ay ahayd dhur buuralay ah oo leh xoogaa waddooyinka Roomaanka ah. magaaloyinkeeda ugu muhiimsani waxay ahaayeen Troo’as, Asoos, iyo Bergamam.

▣ **“Bituniya”** gobolkani sidoo kale waxa uu ahaa woqooyiga galbeed ee Aasiyada Yar, woqooyibari Musiya. May ahayn gobol Roomaan ah maalmihii Luukos, laakiin waxay ku xidhnayd Bontus oo ay isku siyaasad ahaayeen. Butros ayaa mardanbe meeshan wacdiyay (I Butros 1:1). Waxa aan Philo ka baranaynaa in halkaas ay ahaayeen mustacmarado badan oo Yuhuud ah.

16:8 “soo dhaafeen Musiya” halkan sida macnaha ka muuqata waxa loogala jeedaa “dhex mareen” ama “agmareen” (BAGD 625). Xasuusnow, macnaha tuduca oo ha adeegsan qaamuusyada.

▣ **“Taroo’as”** magaaladani waxay afar mayl ka fogayd Troy dii qadiimiga ahayd. Waxa la aasaasay 400 sano kahor waxaanay ahayd magaalo xora oo Giriig ah ilaa uu Roomaanku ka gumaystay markii danbe. Waxa ay ahayd dekad looga goosho Musiya iyo Makedoniya.

16:9 “Bawlos wax riyo ku arkay” Ilaah siyaabo aan caadi ahayn ayuu marar badan u hoggaamiyey Bawlos.

1. iftiin cad iyo codka Ciise, 9:3-4
2. riyo, 9:10
3. riyo, 16:9,10
4. riyo, 18:9
5. riyo, 22:17

6. malagga Ilaah 27:23

▣ **“nin reer Makedoniya ah”** Sidee Bawlos ku ogaaday inuu ahaa reer Makedoniya? Waxa suuto gal ah inay sababtu ahayd lahjaddiisa, dharkiisa, ama in riyada loogu caddeeyay. Mufasiriinta qaar ayaa u malaynaysa in ninkaasi uu ahaa Luukos (aayadda 10).

Tani waxay ahayd go'aan juquraafi ahaaneed oo muhiim ah. injiilku waxa uu u laabanayaa Yurub.

▣ **“kaalay oo na caawi”** falka hore iyo ka labaad labaduba waxa weeyi ficil amar ah. riyadu waxay ahayd mid gaara oo awood leh.

16:10 “anagu” waa marka ugu horraysa ee ay soo aroorayso “anagu” Falimaha Rasuullada dhexdooda. Waxa tani ay tusinaysaa Luukos oo ka qayb ahaa kooxdii Bawlos, Silas iyo Timoteyos (cf. 16:10-17; 20:5-15; 21:1-18; 27:1-28:16). Mufasiriinta qaar ayaa u maleeyay in ninkaas Bawlos uu ku arkay aayadda 9 uu ahaa Luukos, oo ahaa dhakhtar aan Yuhuudi ahayn isla markaasna ah qoraaga Injiilka iyo Falimaha Rasuullada.

▣ **“Makedoniya”** Giriigga maanta jiraa wuxuu u qaybsanaan labo gobol oo Roomaan ah.

1. Akiya oo ah koonfurta (Athens, Corinth, Sparta)
2. Makedoniya oo ah woqooyiga (Philippi, Thessalonica, Berea)

▣ **“nala noqotay”** ereygan *sumbibazō*, waxa loogala jeedaa isku waafiqid ama ku midoobid. Halkan waxa ay ku tusinaysaa in waxa dhacay uu ahaa hoggaaminta Ilaah oo ah in la tago Makedoniya.

1. Ruuxu umuu oggolaanin inay Aasiya wax ka wacdiyaan, cf. aayadda 6
2. Ruuxu umuu oggolaanin Bituniya, cf. aayadda 7
3. iyo riyada aayadda 9

▣ **“Ilaah noogu yeedhay”** waa fal dhammaystiran oo mafcuulku soo horreyo waxna tusinaya. Hoggaanka Ruuxu muu ahayn ammaankooda dartiis, laakiinse waa wacdin darteed. Tanina hadiyo goor waa doonista Ilaah.

NASB (UPDATED) TEXT: 16:11-15

¹¹Haddaba ayaannu Taroo'as ka dhoofnay, oo waxaannu toos u aadnay Samotraki, maalintii xigtayna waxaannu nimid Ne'abolis; ¹²markaasaannu meeshaas ka tagnay, oo waxaannu aadnay Filiboy, taas oo ah magaalomadaxda reer Makedoniya, oo ay reer Rooma u taliyaan, magaaladaas waxaannu joognay dhawr maalmood. ¹³Maalintii sabbida ahayd ayaannu iridda ka baxnay, oo waxaannu tagnay webi dhinacii, meeshaas oo aannu u malaynay meel lagu tukado; markaasaannu fadhiisannay, oo waxaannu la hadallay dumarkii urursanaa. ¹⁴Oo naag Ludiya la odhan jiray, oo dhar guduudan iibin jirtay, oo magaalada Tu'ateyra ka iman jirtay, oo Ilaah caabudi jirtay baa na maqashay; taasoo Rabbigu qalbigeeda furay inay dhegaysato waxyaalihii Bawlos ku hadlay. ¹⁵Oo markii la baabtiisay iyada iyo dadkii gurigeeda. ayay naga bariday iyadoo leh. Haddaad qiyaasaysaan inaan Rabbiga aamin u ahay, gurigayga kaalaya oo jooga. Waana na yeelsiisay.

16:11 “toos u aadnay” tani waxay ka mid tahay ereyo badan oo uu adeegsado Luukos (cutubka 27). Waxay qaateen dooni shiraaceed toos ah. Luukos waxa uu yaqaanay ereyada loo adeegsado dooni shiraaceedyada ama wuxuu si fiican u waraystay kuwo aqoonta u leh.

▣ **“Samotraki”** tani waa jasiirad yar oo dhagaxaan una jirta badda Aegean ka ilaa 5,000 oo dhudhun. Waxay kala badhaysay Troo'as iyo Filibi.

▣ **“Ne'abolis”** macno ahaan waxa weeyi “tuulo cusub.” Waxa jiray magaalooyin dhowra oo magacan lahaa. tani waxay ahayd dekada Filiboy, taasoo ilaa 10 mayl ka fogayd. Dekaddan Jidka Ignatiyanka, ayaa ahaa jidka Roomaanka ah ee u kala goosha bariga iyo galbeedka isagoo ku dhammaada dhinaca bari.

16:12 “Filiboy” Giriiggu waa jamac, waxaanay sheegaysaa midaynta deegaanno dhowra oo ku midoobay hal magaalo. Waxay ku taallay jidkii waynaa ee caanka ahaa ee Roomaanka, jidkii Ignatiya. Magaaladani asal ahaan waxa la odhan jiray Kerinidis (ceelal). Filib II gii Makedoniya ayaa iyada u qabsaday dahabka ay leedahay aawadiis kaddibna isaga ayaa isugu magac daray.



NASB, NRSV

“taas oo ah magaalomadaxda reer Makedoniya”

NKJV

“magaalada ugu muhiimsan Makedoniya”

TEV

“magaalada degmada ugu horraysa ee Makedoniya”

NJB

“magaalo madaxeedka degmadaas”

Weedhani waa midaan lahubin. Amfibolis waxa ay ahayd “magaalo madaxda Makedoniya.” Waxa uu Luukos uga jeedayna lama garanayo. Waxa laga yaabaa inay ahayd meel sharaf gaara leh.

▣ **“oo ay reer Rooma u taliyaan”** sanadkii C.H. 42, Oktafiyan iyo Mark Antony ayaa ka adkaaday Cassius iyo Burutus magaaladan agteeda. Isagoo xasuusan guushan, Oktafiyan waxa uu Filiboy ka dhigay meel Roomaanku ka taliyaan ciidankiisiina halkaasuu dejiyay. Sanadkii 31 C.H., kaddib markii lagaga adkaaday Antony iyo Cleoparta Attiyam, ayaa Oktafiyan waxa uu keenay ciidammo dheeraad ah. meelaha kale ee Roomaanku ka talin jiray laguna sheegay Axdiga Cusub ayaa waxay yihiin Bisidiya dii Antiyokh, Lustara, Toroo’as, Korintos, iyo Botolema. Waxayna dhammaantood muhiimad u lahaayeen magaaloooyinka ku yaalla Talyaaniga.

1. is maamul

2. cashuur dhaaf

3. sharci gaar ah

Bawlos meelahan Roomaanku ka taliyaan waxa uu badanaa ka aasaasay kaniisado.

16:13 “Maalintii sabbida” may jirin sunagogyo ku yaallay Filiboy. Waxa ay ahayd meel uu ka taliyo Roomaanku, waxaana hubaala inaanay joogin meeshaan toban nin oo Yuhuud ahi tuuladan, tiradaasina waxay ahayd ta ugu yar ee laga rabay lahaanshaha sunagoga. Waxa intaas dheeraa kuwo Ilaah ka cabsada ama ahaa kuwo galay diinta Yuhuuda (cf. aayadda. 14; 13:43; 17:4,17; 18:7). Haween badan ayaa waxay ka heleen anshaxa iyo dhaqanka diinta Yuhuudda.

▣ **“webi dhinaciis”** waxay u muuqataa inay ahayd meel wax lagu caabudo (cf. Josephus’ *Antiquities of the Jews* 14.10.23).

▣ **“markaasaannu fadhiisannay”** tani waxa ay ahayd qaabka waxbarista ee rabbaaniyiinta, laakiinse halkani waa magaalo Roomaan ah, sidaasi darteedna, may lahayn muhiimad. Waxa weeyi oo keliya arrin kale oo tusinaysa Luukos oo ahaa markhaati goob jooga.

16:14 “Oo naag Ludiya la odhan jiray, oo magaalada Tu’ateyra ka iman jirtay” gobolka Roomaanka ee Makedoniya waxa uu dumarka u lahaa jaaniyo badan qarnigii koobaad meeshaas. Ludiya waxay ahayd magaalo kamida Aasiyada Yar (cf. Muujintii. 2:17ff). waxa lagu yaqaanay midabaynta basaliga ah taasi oo ay caan ku ahaayeen Roomaanku. Waxa gabadhan meesha ay ka timid ku yaallay sunagog, magaceeduna waxa uu ka yimid Ludiya, gobolkii qadiimiga ahaa, halkaasoo ay ku taallay magaaladu. Iyada laguma sheegin warqadaha Bawlos, sidaasi darteedna waxa laga yaabaa inay dhimatay.

▣ **“oo Ilaah caabudi jirtay”** tani waxa ay sheegaysaa kuwa ka cabsada Ilaah oo ahaa kuwo ka helay diinta Yuhuudda balse ilaa hadda aan noqonin kuwo si buuxda u galay diinta Yuhuudda.

▣ **“Rabbigu qalbigeeda furay”** Kitaabku waxa uu sheegayaa xidhiidhka ka dhexeeya Ilaah iyo aadanaha oo ah axdi. Ilaah hadiyo goor isaga ayaa wax socodsiiya isagoo asaasa xidhiidhka isla markaasna dejiya shuruudaha axdiga (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:47). Badbaadadu waxa weeyi xidhiidh axdi ah, qofna ma badbaadi karo Ilaah oo suurta geliya mooyanee (cf. Yooxanaa 6:44,65). Si kastaba ha ahaatee, Ilaah waxa uu rabaa in aadanaha oo dhami ay badbaadaan (cf. Yooxanaa 3:16; 4:42; Tiitos 2:11; I Timoteyos. 2:4; 4:10; II Butros. 3:9; I Yooxanaa

2:1; 4:14); sidaasi darteedna, muhiimaddu waxa weeyi Ilaah oo dhinac (waxyiga dabiiciga ah, cf. Sabuurka. 19:1-6 waxyiga gaarka ah, cf. Sabuurka. 19:7-14), oo waajaha dadka denbiyadooda (cf. Rooma 1-3) iyo dabiicaddiisa.

Qarsoodigu waxa weeyi muxuu qofna u jawaabaa qofna aanu u jawaabin? Anigu shakhsi ahaan ma aqbali karo jawaabta ah inay tahay doorashada Ilaah, oon kuwa kale ahayn. dadka oo dhami waxay yihiin kuwo laga sameeyay ekaanshaha Ilaah (cf. Bilowgii. 1:26-27) waxaanu Ilaah ballan qaadayaa inuu dhammaantood badbaadiyo sida ku xusan Bilowgii 3:15.

Waxa lagayaabaa inaanay sidaas muhiim u ahayn fahmitaanka sababtu, laakiin inagu waa inaan ka hadlano injiika oo shaqadiisa ku qabano qalbiyada iyo maanka kuwa dhegaysta (cf. Matayos. 13:1-23). Bawlos waxa uu wacdiyay Ludiya iyada iyo qoyskeeduna way ka jawaab celiyeen.

16:15 “Oo markii la baabtiisay iyada iyo dadkii gurigeeda” waxa weeyi qoyskeeda, adeegayaasheeda iyo kuwa u shaqeeya (cf. Korneliyos, Fal 10:2; 11:14; iyo xabsi hayihii reer Filiboy, Fal 16:33). Sidoo kele u fiirso iyadoo sida kuwa kale ee ku sugan Axdiga Cusub markiiba la baabtiisay. Maaha ikhtiyaar! Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:38.

Su’aasha fiqi ahaaneed ee aayaddani keenaysaa waxa weeyi, “miyay carruurta ku jireen tusaalahan qoyska la baabtiisay ee ku sugan Falimaha Rasuullada?” haddii ay sidaas tahay, markaa waxa jira daliil kitaabi ah oo tusinaya in carruurta yaryar la baabtiiso iyagoo ka mida “badbaadada qoyska.” Kuwa soo qaata daliilkani waxa ay sidoo kale tilmaamaan Axdiga Hore xitaa carruurta lagu baabtiisi jiray iyada oo ay ka qayb yihiin ummadda Israa’iil (i.e., gudniinka marka ilmuhu jiro sideed cisho oo keliya, eeg James D. G. Dunn, pp. 175-176).

Inkasta oo hubaashii ay suurto gal tahay rumaysadkaas lagu yeeshay Masiixu waxa uu isla markiiba saameeyay qoyska (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 5:9 iyo 7:9) marka dhinacan laga eegana su’aashu waxay sii noqonaysaa, “Tani ma xaqiiqo caalami ah oo laga rabo dhaqan kasta ayaa?” waxa aan leeyahay Axdiga Cusubi waa muujin ku saabsan shakhsiga oo dareema kuna baraaruga denbiga. Waa in qofkastaa garawsado baahida uu u qabo badbaadiye. Tani waxa ay keenaysaa su’aasha dheeraadka ah ee ah, “Dadku ma waxay Aadan ka dhaxleen denbiga mise waxa ay denbiilayaal yihiin marka ay doortaan addeecis darrada Ilaah?” Diinta Yuhuuddu waxa ay ogolaanaysaa wakhti uu qofku yahay bilaa denbi ilaa uu uga caqliyaysanayo Sharciga iyo dhawristiisa; ragga waxa weeyi da’da 13, dumarkana waxa weeyi da’da 12. Rabbaaniyiintu umay xoojinin Bilowgii 3 sida kaniisadda oo kale.

Axdiga Cusub waa kitaab qaangaadh. Waxa uu sheegayaa jacaylka Ilaah u qabo carruurta, laakiin farriintiisu waxa ay la xidhiidhaa qaangaadhka! Si kastaba ha ahaatee, waxa aan ku noolnahay dumqraadiyad, bulsho ku salaysan xorriyad, laakiin Bariga dhowi waxa weeyi bulsho ku dhaqan qabiil, iyo bulsho qoys isku ah.

▣ **“haddii”** waa jumlad shuruudeed heerka koowaad ah, taasi oo laga malayn karo rumaystaha dhabta ah marka laga eego dhinaca qoraaga ama ujeedooyinkiisa.

▣ **“qiyaasaysaan inaan Rabbiga aamin u ahay”** falka hore waa fal dhammaystiran oo wax tusinaya. Ludiya waxa ay sheegaysaa in hadda ay tahay rumayste. Waxa ay adeegayaashan ku marti gelinaysay gurigeeda iyo inay u adeegsadaan injiilka. Tani waxa weeyi marka loo eego farriintii Ciise ee toddobaatanka markuu u diray adeegga (cf. Luukos 10:5-7).

▣ **“gurigayga kaalaya oo jooga”** Ludiya waxay ahayd qof shakhsiyad wanaagsan, oo ah gabadh ganacsato ah! falkani waxa weeyi fal amar ah; ka labaadna waxa weeyi fal wakhti xaadirka jooga oo amar ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 16:16-18

¹⁶Oo waxaa dhacday, markii aannu u sii soconnay meeshii lagu tukan jiray, in ay naga hor timid gabadh jinni wax sheega qabtaa, taasoo waxsheegiddeeda faa'iido badan ugu keeni jirtay sayidyadeeda. ¹⁷Taasaa Bawlos iyo annaga na soo raacday, wayna qaylisay iyadoo leh, Nimankanu waa addoommadii Ilaaha ugu sarreeya, kuwaasoo idinku wacdiyaya jidka badbaadada. ¹⁸Sidaasna maalmo badan ayay yeelaysay. Laakiin Bawlos oo ka xumaaday ayaa u jeestay oo jinnigii ku yidhi, Magaca Ciise Masiix ayaan kugu amrayaa inaad iyada ka soo baxdid. Markaasuu saacaddiiba ka soo baxay.

16:16 “Oo waxaa dhacday” Tani iyadoo gaar ah ayay maalin kale dhacday, waxa suurta gala inay ahayd Sabtidii ku xigtay. Waxa uu ahaa fursad lala kulmo, laakiin Ilaah ayaa ujeedooyinkiisa ka waday sida uu dhacdo kasta iyo shakhsi kastaba maalin kasta uga leeyahay!

▣ **“jinni wax sheega qabtaa”** waxa jira labo erey oo weedhan loogu adeegsaday naagtana addoonta ah. Ka hore waxa weeyi “wax sheega” (halkan oo keliya ayaa laga helayaa Axdiga Cusub dhexdiisa) waxa uu la xidhiidhaa Axdiga Hore, laakiin Sabtuujantiga waxa loogu adeegsaday ereyo Giriiga oo ka duwan (cf. Laawiyiintii. 19:31; 20:6,27; Sharciga Kunoqoshadiisa. 18:11; I Samuu’eel. 28:3,7; II Boqorradii. 21:6; I Taariikhdi. 10:13). Iyadu waxay ahayd qof uu jinni derderay oo isla markaasna wax sheegta ama fasiraad kabixisa waxyaalaha dabiiciga ah (duulitaanka shimbiraha, daruuraha, koobka cabitaanka waxa ku hadha, beerka xayawaanka, iwm) waxaana laga yaabaa inay wax sii sheegi karta oo mustaqbalka saamayn ku yeelan kartay.

Marka laga eego dhinaca dhaqanka Giriigga ereyga *puthōn*, kaasi oo ka imanaya sheeka baralayda Giriigga waxa jirtay abeeso uu dilay Apollo. Sheeka baraladaydani waxay noqotay wax la isu tebiyo (Delphi), halkaasoo dadku ay kala tashan jireen ilaahyada. Waxa halkani ay caan ku ahayd macbad masaseed (abeesooyin) kuwaasoo ku dul soconaya dadka hoos jiifa macbadka iyadoo ujeedadu tahay in ay ogaan doonaan mustaqbalka marka ay masasku ku dul socdaan.

▣ **“waxsheegiddeeda”** ereygan (fal wakhti xaadirka jooga, dhediga, keli ah) halkan oo keliya ayaa lagaga isticmaalay Axdiga Cusub. Ereyga asalka u ahi waxa uu caan ka dhex yahay Sabtuujantiga isagoo loo adeegsado “waxsii sheegi, ku baraarugu, ama nebi,” hadiyo goorna waa dhinaca macnaha diidmada. Waxa loogala jeedaa ka sida baahsan u sheega waxyaalaha dadka ku iman doona iyo waxyaalaha la socda. Halkan waxa ay ku tusinaysaa ka mustaqbalka waxa imanaya u sheega faa’ido darteed. Macnaha halkan laga faa’idayaana waxa weeyi iyada oo gabadhan uu ku jiray ruux aan daahir ahayni.

16:17 “Bawlos iyo annaga na soo raacday, wayna qaylisay” waa fal wakhti xaadirkaas jooga oon dhammays tirnayn waxna tusinaya. Waa ay daba socotay iyada oo qaylinaysa (aayadda 18).

▣ **“Nimankanu waa addoommadii Ilaaha ugu sarreeya”** Ciise ma aqbalayo markhaati furka jinniga (cf. Luukos 8:28; Markos 1:24; 3:11; Matayos. 8:29) sidoo kale Bawlosna ma aqbali doona maxaa yeelay waxa ay tusin kartaa taageerada jinniga.

Ereyada ah “Ilaaha ugu sarreeya” (cf. Markos 5:7; Luukos 8:28) waxa loo adeegsaday YHWH (i.e., *El, Elyon*) sida ku sugan Bilowgii 14:18-19; II Samuu’eel. 22:14 (Ka eeg Mawduuca Gaarka ah 1:6), laakiin sidoo kale waxa lagu isticmaalay dhaqankan dhexdiisa Zeus. Ruuxa naagtana muu bixinaynin markhaati fur si Ilaah loo ammaano, laakiin si injiilka loola xidhiidhiyo jinniga.

▣ **“kuwaasoo idinku wacdiyaya jidka badbaadada.”** Ma jiro shaqal la socda “jid” (NRSV). Waxa suurto gala inay sheegaysay iyadoo ay jiraan jidad dhowra oo loo maro Ilaah ugu sarreeya. Jinkani iskumuu dayaynin inuu caawiyo Bawlos adeeggiisa, ujeedada hadalkanina waa

1. In Bawlos lagu lifaaqo waxsii sheegis

2. In si kale loo tilmaamo oon ahayn jidka badbaadada (iimaan ku yeelashada Masiixa).

Kitaabka NET (p. 2022 #16) ayaa waxa uu dhigayaa falaqayn wanaagsan oo ku saabsan arrimaha naxwe ahaaneed ee ay koobsanayso tarjumaadda “jidka” vs. “jid.” Waxaanu door bidayaa “jidka.”

Arrinta dhabta ahi waxa weeyi waxa ay fahmeen dhegaystayaashii qarnigii koobaad ee Filiboy. Xagga dhaqankooda, “Ilaaha ugu sarreeyaa” waxa uu noqon karay Zeus, sidaasi darteedna joogitaanka maqnaanshada shaqalka la socda “jid” maaha arrinta la xidhiidha taariikhda iyo macnaha tuduca.

16:18 “Bawlos oo ka xumaaday” halkan Bawlos waxa uu sameeyi ficil celin aanu jacaylku ka baxsanayn, laakiin ka baxsan cadhada. Bawlos waxa uu ahaa qof bani aadana sidoo kale! Isla falkan xooggan waxa laga heli karaa Sabtuujantiga Wacdiyaha 10:9, halkaasoo loogala jeedo shaqaale adag. Axdiga Cusubi waxa uu ku isticmaalay halkan iyo 4:2. Waxa ay tusinaysaa qof si buuxda loogu digay.

▣ “jinnigii ku yidhi” Fiiro u yeelo Bawlos oon lahadlin naagtii addoonta ahayd, laakiin la hadlay jinnigii iyada ku jiray ee adeegsanayay. Bawlos jinni saaristiisu waxay la mid tahay jinni saarista kale ee ku sugan Axdiga Cusub dhexdiisa (ku saarista magaca Ciise). Eeg Mawduucyada Gaarka ah: 5:16.

NASB (UPDATED) TEXT: 16:19-24

¹⁹laakiin sayidyadeedii, markay arkeen in rajadii faa'iidadoodu dhammaatay, ayay Bawlos iyo Silas qabteen, oo waxay u jiiddeen suuqa, taliyayaasha hortooda, ²⁰oo markay xaakinnadana u keeneen, waxay yidhaahdeen, Nimankanu iyagoo Yuhuud ah ayay si weyn magaaladayada u dhibayaan, ²¹oo waxay na barayaan caadooyin aan noo xalaal ahayn inaannu aqbalno oo yeelno annagoo reer Rooma ah. ²²Markaasaa dadkii badnaa ku wada kaceen; oo xaakinnadiina dharkoodii bay ka jeexeen, waxayna ku amreen in la uleeyo. ²³Oo markay ulo badan ku dhufteen, ayay xabsiga ku rideen iyagoo ku amraya xabsihayihii inuu aad u ilaaliyo; ²⁴isaguna markuu amar caynkaas ah helay, wuxuu iyagii ku riday xabsigii ugu hooseeyey, cagahoodana qori buu aad ugu xidhay.

16:19 “markay arkeen in rajadii faa'iidadoodu dhammaatay” “sayiddadani” iyagu dan kamay galin qofkan bani aadanka ah ee laga xoreeyay sharkii addoonsanayay, laakiinse waxay ka xanaaqeen iyagoo waayay faa'idadoodii (aayadda 16), waxayna aad uula mid ahaayeen dadka ku sugan Luukos 8:26-39.

▣ “ayay Bawlos iyo Silas qabteen” waxa Luukos iyo Timoteyos loo qaban waayay lama garanayo.

16:20 “xaakinnadana” waa ereyga ah *praetors*. Gaar ahaan magacyadoodu waxay ahaayeen *duumvirs*, laakiin waxa aan Cicero ka baranaynaa in kuwo badan loogu yeedhi jiray *Praetors*. Luukos si saxa ayuu u adeegsanayaa saraakiishii Roomaanka magacyadooda, tanina waxa weeyi mid ka mida caddaymaha taariikhda saxda ah.

16: 20, 21 “iyagoo Yuhuud ah. . .anagoo Roomaan ah” tani waxa ay tusinaysaa sida ay ugu faanayeen cirqigooda. Wakhtii Bawlos uu joogay Filiboy waxa laga yaabaa inuu u dhowaa Kalawdiyas wakhtigii uu Yuhuudda ka eryay Rooma, taariikhdu markay ahayd C.D. 49-50 (waxa uu mamnuucay inay wax caabudaad ah sameeyaan). Roomaanka oo kasoo horjeeday samatiga waxa laga arki karaa Cicero kitaabkiisa *Pro Fiasco* 28 iyo *Javenal* 14.96-106.

▣ “oo waxay na barayaan caadooyin aan noo xalaal ahayn inaannu aqbalno” u fiirso iyada oo xukunkani aanu la xidhiidhin jinnigii laga saaray naagtii addoonta ahayd. Waxa ay tusinaysaa wacdintooda ay injiilka Ciise Masiix wax ku wacdinayaan. Diinta Yuhuuddu waxay ahayd diin laga ogolyahay Boqortooyada Roomaanka, laakiin waxa caddaatay iyada oo Masiixiyadda loo arkay inay tahay mid gaar ah, oo ah diin aan sharciyaysnayn. Yuhuudda looma oggolayn inay dadka Roomaanka ah ku daraan diintaada sidoo kalena Bawlos isna looma oggolayn.

16:22 “dharkoodii bay ka jeexeen, waxayna ku amreen.” Falku waxa uu tusinayaa in labadii *Praetors*, dadkii ay kiciyeen isla markaana Bawlos iyo Silas dharkii laga dhigay (fal tegay, oo jamac ah). middani iyaga caadi uma ahayn iyo in la geliyo arrin lagu xukumi karo.

1. dharkoodiibaa laga jeexjeexay (fal tegay oo mafcuulku soo horreeyo)
2. waxa la amray in la uleeyo (fal aan dhammaystirnayn oo wax tusinaya isla markaana uu la socdo fal wakhti xaadirka jooga oon bar dhammaad lahayn).

▣ “in la uleeyo” ciqaabka noocan ahi (i.e., *verberatio*, kaasi oo ay xukumeen taliyayaashii magaaladu) muu u xumayn sida ciqaabista Roomaanka. Ma jiro tiro cayiman oo sheegaysa inta la uleeyay. Bawlos waxa la garaacay ilaa saddex jeer (cf. II Korintos. 11:25). Tanina waa midda keliya ee la diiwaan geliyay (cf. I Tesaloniika. 2:2).

▣ **16:24 “xabsigii ugu hooseeyey”** waxa loogala jeedaa meesha ugu ilaalada badan. Waxa jirtay cabsi halkan ka muuqatay (aayadda 29). Bawlos jinni saaristiisu waxa ay soo jeedisay dareenkooda.

▣ “cagahoodana qori buu aad ugu xidhay” badanaa jeelalka wakhtigaasi waxa ay lahaayeen silsilado ku xidhan gidaarka oo lagu xidhi jiray maxbuuska. Sidaasi darteed, albaabada oo keliya ayaa furnaa oon xidhnayn. Qoryahanina waxa ay fidin kareen cagaha iyaga oo sababayay raaxo darro iyo weliba ilaalo dheeraad ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 16:25-34

²⁵laakiin abbaaraha habeenbadhka Bawlos iyo Silas ayaa tukanayay oo Ilaah gabay ku ammaanayay, maxaabiistuna way dhegaysanayeen; ²⁶oo filan la aan waxaa dhacay dhulgariir weyn, sidaas darteed aasaaskii xabsigu waa ruxmay; oo markiiba albaabbadii oo dhammu waa wada furmeen; mid walbana silsiladihiisii waa ka furmeen. ²⁷Xabsihayihiina markuu hurdada ka toosay oo arkay albaabbadii xabsiga oo wada furmay. ayuu seftiisii la baxay oo ku dhowaaday inuu isdilo, maxaa yeelay, wuxuu u malaynayay maxaabiistii inay baxsatay. ²⁸laakiin Bawlos baa cod weyn ku qayliyey isagoo leh, Waxba ha isyeelin; maxaa yeelay, kulligayo halkaannu wada joognaa. ²⁹Markaasuu cid u diray siraaddo, oo gudaha ku booday isagoo baqdin la gargariiraya, oo wuxuu ku hor dhacay Bawlos iyo Silas, ³⁰markaasuu dibadda u soo saaray, oo ku yidhi. Sayidyadow, maxaa igu waajib ah inaan yeelo inaan ku badbaado? ³¹Kolkaasay ku yidhaahdeen, Rumayso Rabbi Ciise, waadna badbaadi doontaa, adiga iyo dadka gurigaaguba. ³²oo hadalka Rabbiga ayay kula hadleen isaga iyo kuwii gurigiisa joogay oo dhan. ³³Markaasuu wakhtiga habeenka qudhiisa iyagii kaxeeyey oo nabarradoodii ka maydhay; oo markiiba waa la baabtiisay isagii iyo dadkiisii oo dhanba. ³⁴Haddaba gurigiisuu iyagii keenay oo cunto hor dhigay. Isagoo Ilaah rumaysanna ayuu aad ula farxay kuwii gurigiisa joogay oo dhan. ³⁵laakiin kolkii ay maalin noqotay ayaa xaakinnadii waxay direen saraakiishii oo leh, Nimankaas sii daa.

16:25 “abbaaraha habeenbadhka” dabcan may seexan karaynin xaanuunka iyo qoryaha ku xidhan aawadood.

▣ “ayaa tukanayay oo Ilaah gabay ku ammaanayay” waxa suurto gal ah in macnaha fiqi ahaaneed ee tukashadani iyo gabaygani ay maxaabiiska ku sababeen inay rumaystaan Masiixa (“maxaabiistuna way dhegaysanayeen”) maxaa yeelay maxaabiista midna kamuu baxsan markii dhul gariirku furay albaabada (cf. aayadaha. 26,28, “kulligayo halkaannu wada joognaa”).

▣ “maxaabiistuna way dhegaysanayeen” waa fal aan dhammays tirnayn oo wax tusinaya, waxaanu sheegayaa inay si joogto ah u dhegaysanayeen Bawlos iyo Silas. Falka ah *epakroaomai* wa erey dhif ku ah Axidiga Cusub dhexdiisa iyo Sabtuujantigaba. Isticmaalistiisa ku sugan I Samuu’eel 15:22 waxa uu tusinayaa dhegaysashada lagu faraxsanyahay. Maxaabiistani haddaba waxa ay u xaasadaysnaayeen oo dhegaysteen kana jawaab celiyeen farriinta ah jacaylka Ilaah, daryeelkiisa, iyo aqbalitaankiisa!

16:26 “dhulgariir” tani waxay ahayd dhacdo dabiici ah, laakiin waxa ku ladhnaa, ujeedo, wakhtiyayn iyo saamayn (cf. Matayos. 27:51,54; 28:2). Ilaah waxa uu xabsiga ka badbaadiyay Butros isagoo adeegsaday malag (4:31), laakiin halkan dhacdada lagu doortay ayaa waxa ay Bawlos siisay inuu injiilka ku wacdiyo Maxaabiistii iyo ilaaladii jeelka.

16:27 “seeftii” waxa ay ahayd seefta labada dhinac leh ee suunku ku xidhan yahay oo loo afeeyay sida carrabka. Tani waxay ahayd wax lagu ciqaabo dadka Roomaanka ah. haddii xabsi ilaaliyuhu ay ka baxsadaad maxaabiistu waxa uu u silcayaa baxsashadooda (12:19).

16:28 Bawlos iyo Siilas iimaankooda iyo waxyaalaha ku jira tukashadooda iyo gabaygooda ayaa saamayn wayn ku yeeshay Maxaabiistii kale (waxaan u malaynayaa in iyaguna sidoo kale ay badbaadeen!)

16:29 “cid u diray siraaddo” Fiiro u yeelo jamaca. Waxa jiray jeel hayayaal kale.

16:30 “Sayidyadow, maxaa igu waajib ah inaan yeelo inaan ku badbaado?” tani waxa ay u noqonaysaa dadka (1) ka cabsashada awoodda aan caadiga ahayn iyo (2) raadinta Ilaah oo nabad lala yeesho! Waxa uu doonay

nabadda iyo farxadda ay Bawlos iyo Siilaas haysteen xitaa iyadoo lagu jiro xaaladahan. Fiiro u yeelo ninkan oo sida kuwo badan, ogsoonaan inay jirto ka jawaab celin aadanaha laga rabo (cf. Luukos 3:10,12,14; Fal 2:37; 22:10).

16:31 “Rumayso Rabbi Ciise” falka (fala amar ah) *piseuo* waxa loo tarjumi karaa “rumays,” “iimaan,” “isku hallayn.” Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:40, 3:16, iyo 6:5. Ugu horrayn waa ka jawaab celin isku hallayn ah (10:43). Sidoo kale u fiirso iyadoo ah isku hallaynta shakhsi, oon ahyan caqiido ama nidaam fiqi ahaaneed. Ninkani waxa uu asal ahaan ahaa Yuhuudi (i.e., Ninevites ka ku sugan Yoonis). Hase ahaatee waxyaalaha laga rabo badbaadada dhammayska tiran way fududahay waana isku mid! Tanina waa soo koobitaanka ijiilka ku sugan Axdiga Cusub (10:43). Towbad keenkiisa (cf. Markos 1:15; Fal 3:16,19; 20:21) waxa lagu tusay ficilladiisa.

▣ **“waadna badbaadi doontaa, adiga iyo dadka gurigaaguba.”** Dunidii hore diinta uu haysto madaxa qoysku waxay ahayd midda ay haystaan dhammaanba xubnaha qoysku (cf. 10:2; 11:14; 16:15; 18:8). Sida middani ay qofkasta ugu shaqaysay lama hubo, laakiin qof walba si ayuunbuu uga qayb ahaa iimaankooda. Bawlos waxa uu si joogto ah injiilka oo buuxa ugu wacdiyay jeel hayaha iyo gurigiisa (aayadda 32).

Sida halkan ka muuqatana maaha gurigiisa oo keliya balse waxa la socda xabsigiisa!

16:32 “hadalka Rabbiga” waxa jira kala duwanaansho ku saabsan weedhan.

1. “Hadalka Rabbiga” sida ku sugan MSS P^{45, 74}, κ^2 , A, C, D, E. UBS⁴ wuxuuku bixinayaa “B” isagoo ku tirinaya (hubaal).
2. “Hadalka Ilaah” sida ku xusan MSS κ^* , B

Macnaha dhexdiisa yaa ereyga “Rabbi” uu sheegayaa?

1. Ciise, aayadda. 31
2. YHWH (cf. aayadaha. 25,34; 13:44,48; waa weedh Axdiga Hore ah cf. Bilowgii. 15:14; I Samuu’eel. 15:10; Ishacyaah. 1:10; Yooxanaa 1:1)

16:33 “oo markiiba waa la baabtiisay isagii iyo dadkiisii oo dhanba.” Middani waxay tusinaysaa muhiimadda ku jirta baabtiiska. Falimaha Rasuulladu marar badan ayuu sheegayaa middan. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Baabtiiska 2:38. Ciise wuu sameeyay (Luukos 3:21) waanu amray (cf. Matayos. 28:19) taasina way dejinaysaa (cf. Fal 2:38). Sidoo kale waxa ay la mid tahay tusaalayaal kale oo ku sugan Falimaha Rasuullada in baabtiisku markiiba uu yimid kaddib markii ay qirteen iimaankooda (cf. Fal 10:47-48). Macno marka laga eero waxa ay ahayd qirasho rumaysadka la rumaysanayo Masiixa lagu qirto meelaha fagaaraha (i.e., Rooma. 10:9-13).

16:34 “Isagoo Ilaah rumaysanna ayuu aad ula farxay kuwii gurigiisa joogay oo dhan.” Labada falba waxa weeyi keli isagoo sheegaya xabsi hayaha. Si kastaba ha ahaatee, weedhani waxay tusinaysaa iyadoo ninkan qoyskiisa iyo adoommadiisa lasoo guda geliyay.

Falka ah, “rumaystay” waa fal dhammaystiran oo tusinaya xaalad sugan. Fiiro u yeelo is beddelka ku yimid falka aayadda 31.

NASB (UPDATED) TEXT: 16:35-40

³⁵laakiin kolkii ay maalin noqotay ayaa xaakinnadii waxay direen saraakiishii oo leh, Nimankaas sii daa. ³⁶Markaasaa xabsihayihii hadalladaas u sheegay Bawlos, oo wuxuu ku yidhi, Xaakinnadii baa amar soo diray in laydin sii daayo; haddaba soo baxa oo nabad ku taga. ³⁷laakiin Bawlos baa wuxuu iyagii ku yidhi, Caddaan bay noogu garaaceen annagoo aan nala xukumin oo ah niman reer Rooma, oo waxayna nagu rideen xabsi; imminkana ma qarsoodi bay nooga saarayaan? Sidaas ma aha; laakiin iyaga qudhoodu ha yimaadeen oo dibadda ha noo saareen. ³⁸Haddaba saraakiishii baa hadalladaas u sheegay xaakinnadii; oo kolkay maqleen inay reer Rooma yihiin ayay baqeen. ³⁹Markaasay yimaadeen oo cafi ka baryeen; oo kolkay dibadda u soo saareenna, waxay weydiisteen inay magaalada ka tagaan. ⁴⁰Oo markay xabsigii ka soo baxeen waxay galeen gurigii Ludiya, oo kolkay walaalihii arkeenna ayay dhiira geliyeen oo ka tageen.

16:35 “saraakiishii” macne ahaan waan “sirkaal” (*hrabdouchosta lictor*). Tani waxa ay sheegaysaa kuwa ku lugta lahaa anshaxa gaar ah (aayadda 20). “faashistihii” Talyaaniga ayaa magacooda waxay kasoo qaateen halkan. Saraakiishani (ka ahaatay Laatiinka *fascēs*) waxay calaamad u ahaayeen awoodda siyaasadeed.

16:37 “niman reer Rooma” Filiboy waxay ahayd mustacmarad Roomaani ah oo haystay faa’dooyin badan oo xagga sharciga ah taasi oo noqon ka noqon karta Rooma haddii caddaalad darradan iyo kala eexashadan laga waramo. Garaacitaanka dadka Roomaanka ahi waxay ahayd sharci darro (cf. aayadda. 39; eeg Livy, “*History*” 10.9.4 ama Cicero, “*Pro Rabirio* 4.12-13).

16:39 ujeedada kacdoonka Bawlos waxa weeyi ayaa suurta gal ah in la ilaaliyo kaniisadda curdinka ah ee Filiboy iyo in lagu guulaysto xaalad aqoonsi oo loo helo iyaga. hoggaamiyayaashani, waxyaalaha ay sameeyeen, waxa ay tusiyeen in ku wacdinta injiilku ay tahay sharci darro! Albaabkuna wuxuu ahaa mid u furan awoodinta wacdinta mustaqbalka ee Filiboy dhexdeeda.

16:40 “oo ka tageen.” Luukos waa uu ka danbeeyay iyaga. waxa aan arkaynaa isaga oo ilaa hadda jooga halkan sida ku xusan 20:5-6.

SU’AALO FALQAYN AH.

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxaa Ruuxa Quduuska ah loogu magacaabay Ruuxa Ciise?
2. Muxuu Ilaah adeegayaasha ugu oggolaaday inay la kulmaan dhibaato iyo in lagaoo horjeeso?
3. Muxuu Bawlos u aqbali waayay markhaati furkii naagta addoonta ah?
4. Sheeg dadkii ku badbaaday Filiboy.
5. Maxaa Bawlos iyo Silas oo keliya loo xidhay?
6. Maxay maxaabiista kale u baxsan waayeen?
7. Sheeg waxyaalaha badbaadada ee ku diiwaan gashan cutubkan. Miyay ka duwanyihiin kuwa kale ee ku sugan cutubyada Falimaha Rasuullada?
8. Miyuu xabsi hayahani lahaa asal ah diinta Yuhuudda ama Masiixiyadda?
9. Maxaa loogala jeedd “dadkiisii oo badbaaday”?
10. Muxuu Bawlos sariikiishii uga dhigay inay cudurdaartaan?

FALIMAHA RASUULLADA 17

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Nidaam la'aantii ka jirta Tesaloniika	Masiixa oo lagu wacdiyay Tesaloniika	Tesaloniika ilaa Atenis	Tesaloniika dhexdeeda	Tesaloniika: dhibaatooyinkii xagga Yuhuudda
17:1-9	17:1-4 Weerarkii Guriga Yasoon 17:5-9	17:1-9	17:1-4 17:5-9	17:1-4 17:5-9
Rasuulladii oo jooga Beroya	Ka adeegitaankii Beroya		Beroya dhexdeeda	Dhibaatooyinkii cusbaa ee Beroya
17:10-15	17:10-15	17:10-15	17:10-15	17:10-12 17:13-15
Bawlos oo jooga Ateenay	Faylosufaradii joogay Ateenay	Bawlos oo jooga Ateenay	Ateenay dhexdeeda	Bawlos oo joogay Atenaay
17:16-21	17:16-21 Ka hadlitaankii Are'obagos	17:16-21	17:16-21	17:16-18 17:19-21
17:22-28a	17:22-34	17:22-31	17:22-31	17:22a Bawlos oo ka hor hadlay Are'obagos 17:22b-23 17:24-28
17:28b-31				17:29 17:30-31
17:32-34		17:32-34	17:32-34	17:32-34

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraaga waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

Kormaris kooban oo ah fariintii Bawlos uu kula Giriiggii joogay Ateenay (17:15-34). Waxa ay la mid tahay Fal 14:15-18.

- A. Waxa jira hal Ilaah, Abuuraha samada (ruux) iyo dhulka (maadada)
 1. kaasoo ay jaahil ka yihiin
 2. kaasoo aan dhexjoogin macbaddada dadka ama sanamyada
 3. kaasoo aadanaha aan waxba uga baahnayn
 4. oo ah isha keliya ee aadanaha
- B. Waxa uu maamulaa taariikhda aadanaha oo dhan
 1. quruumaha oo dhan wuxuu ka sameeyay hal nin
 2. wuxuu dejiyaa xuduudaha aadanaha
- C. Dadka wuxuu ku beeray inay isaga gaartaan, man aadka sida isaga lagu helaa
- D. Denbiga ayaa isaga inaga soocay
 1. waxa uu eegay denbiyada wakhtiyadii jaahiliga
 2. waa inaan towbad keenno
- E. Waxa uu xukumi doonaa makhluuqaadiisa
 1. waxa jirta maalinta qiyaamaha
 2. xukunku waxa uu ku iman doonaa Masiixa
 3. Masiixan waxa laga sarakiciyay kuwa dhintay si uu u caddeeyo shakhsiyaddiisa iyo shaqadiisa.

Magaalada Tesaloniika

- A. Taariikhda kooban ee Tesaloniika
 1. Tesaloniika waxay ku taallay madaxa Khaliijka Termayik. Waxa ahayd magaalo ku taalla xeebta oo loo maro Ignatiya (jidka quruumaha) waddadii Roomaanka ee ugu muhiimsanayd oo xagga bari uga kacda Rooma. Waxay ahayd dekad sidoo kalena waxay ku dhowayd dhulka biyaha qaniga ku ah. saddexdan faa'iido waxa ay Tesaloniika ka dhigeen magaalada ugu wayn xagga ganacsiga iyo siyaasadda Makedoniya.
 2. Tesaloniika asal ahaan waxa lagu magacaabi jiray Terma, oo laga soo dhegtay ililado kulul oo ku yaalla meeshaas. Taariikhyahanka hore, Pliny the Elder, ayaa ku sheegaya in Terma iyo Tesaloniika ay wada jireen. Haddii sidan ay tahay, Tesaloniika waxay ku wareegsanayd Terma (Leon Morris, *The First and Second Epistles to the Thessalonians*, Grand Rapids: Wm. B. Eerdmans Publishing Company, 1991, p. 11). Hase ahaatee, badanaa taariikhyahanadu waxay rumaysanyihiin in Kasandar oo ahaa mid ka mida Aleksandarradii Waynaa uu iyada dib ugu magacaabay sanadkii 315 C.H. kaddib Filibkii Makedoniya gabadhiisa iyo Aleksandar walaashiis iyo xaaskiisu ay ku magacaabeen

Tesaloniika (Strabo VII Fragment 21). Wakhti ka mida qarniyadii hore ee faafitaanka Masiixiyadda, ayaa Tesaloniika ay yeelatay naanaysta “magaalada asal raaca” sababta dabecaddeeda Masiixiga ah aawadeed (Dean Farrar, *The Life and Work of St. Paul*, New York: Cassell and Company, Limited, 1904, p. 364). Maanta Tesaloniika waxa loo yaqaana Salonika ilaa haddana waa magaalo muhiim ka dhex ah Giriigga.

3. Tesaloniika waxa ay ahayd meel ay isugu yimaaddeen sida Korintos, dad badan oo degay oo ka kala socda dunida wakhtigaas la yaqaanay.
 - a. dadyowga Barbaric Germanic ga ee reer woqooyiga ahaa ayaa ku noolaa meeshaas, iyaga oo la yimid dhaqankoodii iyo diintoodii jaahiliga ahayd.
 - b. Giriigtu halkaas ayay ku noolaayeen iyaga oo ka imanaya Akiya ilaa koonfurta jasiiradaha Badda Aegean ka, iyaga oo marka ay soo laabanayaana la iman jiray falsafaddooda.
 - c. Roomaankii reer galbeedka ahaa ayaa iyaguna halkaas degay. Badankooduna waxay ahaayeen askar hawl gabtay waxaanay la yimaaddeen doonistooda, hodantinimadooda, iyo awooddooda siyaasadeed.
 - d. Ugu dambayntii, Yuhuud badan ayaa kaga timid dhinaca bariga; saddex meeloodow meelna dadka meesha deganina waxay ahaayeen Yuhuud. Waxa ay la yimaaddeen qabaa'ilkooda iyo iimaankooda ku dhisan tawxiidka iyo dhalashadooda.
4. Tesaloniika oo tirada dadka ku nooli ku dhowaad ahaayeen 200,000 qof, waxa ay ahayd magaalo dad kala duwani ku noolyihiin. Waxa ay ahayd xarunta caafimaadka waayo waxay lahayd ilo biyo ah oo kulul. Waxay ahayd xarunta ganacsi waayo waxay ahayd dekad. Waxaana marayay jidka wayn ee Ignatiyaanka.
5. Iyadoo ah magaalada caasimadda ah ee ugu wayn, Tesaloniika sidoo kale waxay ahayd xarunta siyaasadeed ee Makedoniya. Iyadoo ahayd caasimad ay degan yihiin dad badan oo u dhashay Roomaanku (badanaa askar hawl gabtay), waxa ay noqotay magaalo xor ah. Tesaloniika lagama qaadi jirin cashuur sharciga Roomaankana umay hoggaansanayn, maadaama oo dadka badankoodu ahaayeen Roomaan. Haddaba, xaakinnada Roomaanka waxa lagu magacaabi jiray “taliyayaal.” Magacani meelna kagama muuqanayo qoraallada, laakiin waxa lagu arkay mid ka mida albaabada Tesaloniika oo loo yaqaano Albaabka Fardar (Farrar, p. 371n.).

B. Dhacdooyinka Bawlos u hoggaamiyay inuu yimaaddo Tesaloniika.

1. Dhacdooyin badan ayaa Bawlos u hoggaamiyay Tesaloniika, hase ahaatee dhacdooyinka jidh ahaaneed ayaa sax ah, yeedhitaanka Ilaah ee hubaasha ah. Bawlos asal ahaantii muu qorshaysan inuu galo qaaradda Yurub. Waxa uu rabay socdaalkiisa adeegitaanka ah ee labaad inuu ku dib ugu booqdo kaniisadaha ku yaalla Aasiyada Yar oo ah kuwii uu aasaasay socdaalkiisii hore iyo inuu intaas dabadeed u laabto dhinaca bari. Markii uu u kacay xagga woqooyi bari ayaa Ilaah ka xidhay albaabadaas. Middan waxa sababay riyadii ninka reer Makedoniya ee Bawlos ku riyooday (cf. Fal 16:6-10). Tani waxay sababtay in labo waxyaalood dhacaan: ugu horrayn, qaaradda Yurub ayaa la wacdiyay, marka labaadna, maadaama oo Bawlos uu dhacdooyin kusoo maray Makedoniya, waxa uu bilaabay inuu qoro waraaqihiisa (Thomas Carter, *Life and Letters of Paul*, Nashville: Cokesbury Press, 1921, p. 112).
2. Dhacdooyin jidh ahaaneed ayaa Bawlos ku hoggaamiyay Tesaloniika
 - a. Bawlos wuxuu tegay Filiboy, oo ahayd tuulo yar oon lahayn sunagog. Shaqadiisii halkaas waxa ka horyimid kuwo lahaa “waxsii sheegis” jinni ah oo ay lahayd naag addoon ahi iyo guddigii magaalada. Bawlos waa la garaacay si xunna waa loola dhaqmay, hase ahaatee waxa samaysantay kaniisad. Kacdoonkii lagaga horyimid iyo jidh dilkii aawadiis, ayaa Bawlos ku qasbay inuu tago, waxaana suurto gal ah inuu ka dhakhsaday sidii markii hore uu rabay.

- b. Halkee uu meeshaas uga bixi doonay? Waxa uu dhaafay Amfibolis iyo Aboloniya, kuwaas oo iyaguna lahaa sunagog.
- c. Waxa uu yimid meeshaas magaalada ugu wayn, oo ahayd Tesaloniika, oo lahayd sunagog. Bawlos waxa uu ugu horrayntaba u tegi jiray dadka Yuhuudda ah. Sidanna wuxuu u sameeyay sababtoo ah
 - (1) iyagoo aqoon u lahaa Axdiga Hore;
 - (2) jaaniska waxbarista iyo ka wacdinta sunagoga oo suuro;
 - (3) iyagoo ahaa dadka la doortay, dadka Ilaah axdigiisa la dhigtay (cf. Matayos. 10:6; 15:24; Rooma. 1:16-17; 9-11);
 - (4) Ciise markii hore wuxuu u tegay iyaga, kaddibna dunida – Bawlosna sidaasoo kale ayuu sameeyay isagoo raacaya tusaalaha Masiixa.

Bawlos kuwii la socday

- A. Bawlos waxa la socday Silas iyo Timoteyos Tesaloniika dhexdeeda. Luukos waxa uu la socday markii la joogay Filiboy halkaas ayaanu kaga hadhay. Waxa middan ina tusinaysa “anaga” iyo “iyagu” oo lagu arkayo Fal 16 iyo 17. Luukos marka la joogo Filiboy waxa uu ku hadlayaa “anagu” laakiin marka loo socdaalay Tesaloniika wuxuu adeegsanayaa “iyagu.”
- B. Siilas, ama Silfanas, waxa uu ahaa ninkii uu Bawlos kaxaystay socdaalkiisii labaad kaddib markii Barnabas iyo Yooxanaa Markos ay dib ugu laabteen Qubrus.
 - 1. Waxa isaga ugu horrayn Kitaabka dhexdiisa lagaga sheegay Fal 15:22, halkaasoo lagu tilmaamay inuu hoggaamiye ka yahay walaalaha kaniisadda Yerusaaalem.
 - 2. Sidoo kale waxa uu ahaa nebiy (cf. Fal 15:32).
 - 3. Waxa uu haystay dhalasho Roomaan ah sida Bawlos oo kale (cf. Fal 16:37).
 - 4. Isaga iyo Yuudas Barnabas ayaa loo diray Antiyokh, kaniisadda Yerusaaalem ayaana u dirtay si ay xaaladda usoo qiimeeyaan (cf. Fal 15:22,30-35).
 - 5. Bawlos ayaa isaga ku ammaanaya II Korintos. 1:19 waxaanu sidoo kale ku sheegayaa waraaqo dhowr ah.
 - 6. Mardanbe ayaa la sheegay inuu la joogay Butros markii la qorayay I Butros (cf. I Butros. 5:12).
 - 7. Bawlos iyo Butrosba waxay ugu yeedheen Silfanas halka Luukos uu kaga magacaabay Siilas.
- C. Timoteyos isna waxa uu la socday Bawlos
 - 1. Bawlos waxa uu isaga kula kulmayo Lustara, halkaasoo markii hore uu ku yeeshay rumaysadka.
 - 2. Timoteyos waxa uu badh ka ahaa Giriig (aabbihiiis) iyo badh Yuhuudi (hooyadiis). Bawlos waxa uu rabay in uu isaga kala shaqeeyo wacdinta kuwa aan Yuhuudda ahayn.
 - 3. Bawlos ayaa guday isaga si uu ula shaqayn karo kuwa aan Yuhuudda ahayn.
 - 4. Timoteyos waxa lagu sheegay salaanta ku sugan: II Korintos, Kolosay, I iyo II Tesaloniika iyo Filemon.
 - 5. Bawlos waxa uu isaga ku tilmaamayaa “wiilkiigay xagga adeegga” (cf. I Timoteyos. 1:2; II Timoteyos. 1:2; Tiitos 1:4).
 - 6. Sida laga dhadhansanayo codka Bawlos ee warqadihiisa Timoteyos waxa uu ahaa wiil da’diisu yartahay. Laakiinse Bawlos wuu ku kalsoonaa (cf. Fal 19:27; I Korintos. 4:17; Filemon. 2:19).
- D. Waxa keliya oo qaybtan ku habboon kuwa la socday Bawlos in lagu sheegay niman u socday Tesaloniika oo raacay Bawlos adeegyadiisii kale. Waxa weeyi Aristarkas (Fal 19:29; 20:4; 27:2) iyo Sekandas (Fal 20:4). Sidoo kale, Demas waxa uu noqon karay mid ka socday Tesaloniika (Filemon. 24; II Timoteyos. 4:10).

Adeegii Bawlos ka waday magaalada

- A. Adeegga Bawlos ee Tesaloniika waxa uu ku raacay tusaalihiisa ahaa inuu ugu horraynta u tago Yuhuudda kaddibna usoo laabto kuwa aan Yuhuudda ahayn. Bawlos saddex Sabtiyood ayuu sunagoga ka dhex wacdiyay, farriintiisuna waxay ahayd in “Ciise yahay Masiixa.” Waxa uu adeegsaday Qorniinka Axdiga Hore si uu u tusiyo Masiixa oo ahaa mid silciya (cf. Bilowgii. 3:15; Ishacyaah. 53), isagoon ahayn Masiix siyaasi ah. Bawlos sidoo kale waxa uu xoojiyay sarakicista isagoo badbaadana siiyay dhammaan. Ciise waxa si cad loogu silciyay isaga oo ahaa Masiixa hore loo sii ballan qaaday oo ah mid dadka oo dhan badbaadinaya.
- B. U jawaabitaanka farriintani waxa uu ahaa, in kuwo ka mida Yuhuudda iyo kuwo aan Yuhuudda ahayni, iyo sidoo kale dumar muhiim ahi ay aqbaleen Ciise inuu yahay badbaadiyohooda iyo Rabbigooda. Faahfaahinta kooxahan rumaysadka yeeshay waxa laga fahmi karaa warqadda Bawlos u qoray kaniisaddan.
- C. Kuwa aan Yuhuudda ahayni iyaga ayaa ahaa xubnaha ugu badan kaniisadda sida laga arkayo labada waraaqood oo aan laga helayn waxyaalo la xidhiidha Axdiga Hore. Kuwa aan Yuhuudda ahayni si dhaba ayay u aqbaleen in Ciise uu yahay Badbaadiyohooda iyo Rabbigooda sababo dhowra aawadood.
1. Diimo dhaqameedkoodu waxay ahaayeen kuwo bilaa awood ah. Tesaloniika waxay ku istaageen Buur Olimbas waxaanay ogaadeen in sarraynteedu madhantahay.
 2. Injiilku waxa uu xor u ahaa cid kasta.
 3. Masiixiyaddu kamay koobnayn oo keliya ama gaar umay ahayn Yuhuudda. Diinta Yuhuuddu kuwo badan ayay soo jiidatay tawxiidnimada daraaddeed iyo anshaxeeda sarreeya, laakiin kuwo badan ayaa kaga soo horjeestay waxyaalaha ay ku dhaqmaan aawadood (sida gudniinka), iyo waxyaalaha ciriqi ahaan ay dhaxaltooyada u leeyihiin.
- D. Kuwo badan oo ahaa “dumar madaxa” ayaa aqbalay Masiixiyadda iyagoo dumarkan kartidooda ku samayn karay ikhtiyaarkooda diimeed. Dumarku badanaa waxay Makedoniya iyo Aasiyada Yar ku ahaayeen xor iyagoo taas kaga duwanaa qaybaha kale ee dunidii Giriigga iyo Roomaanka (Sir Wm. M. Ramsay, *St. Paul the Traveler and Roman Citizen*, New York: G. P. Putnam’s Sons, 1896, p. 227). Hase ahaatee, dabaqadda dumarka faqiirka ahi, inkastoo ay xor ahaayeen, waxay haddana hoos joogeen cadaadiska kuwa ka sarreeya (Ramsay, p. 229).
- E. Kuwo badan ayay dhibaato ku noqotay intii ay leekayd muddadii uu joogay Bawlos Tesaloniika:
1. Fal 17:2 waxay ka hadlaysaa sababta Bawlos uu sunagoga u tegay saddex Sabti intii uu joogay Tesaloniika.
 2. I Thess. 2:7-11 waxay sheegaysaa Bawlos oo ganacsigiisa watay. Tani waxay ahayd dakhli samayn ama sida qaar soo jeediyeen ku shaqaynta haragga.
 3. Filiboy. 4:16 waxay taageeraysaa deganaanshaha dheer, markii uu Bawlos ugu yaraan guddoomay labo hadiyadood oo ka socday kaniisaddii Filiboy markii uu joogay Tesaloniika. Masaafada u dhexaysa labada magaalo waxa weeyi ku dhowaad 100 mayl. Qaar ayaa sheegaya in Bawlos uu joogay ku dhowaad labo ama saddex bilood iyadoo saddexdaas Sabtina ay tusinayaan adeegii uu ka dhex waday Yuhuudda (Shepard, p. 165).
 4. Waxyaalaha kala duwan ee ku sugan Fal 17:4 iyo I Tesaloniika 1:9 iyo 2:4 waxa ay taageerayaan aragtida, waxyaalaha ugu muhiimsan ee kala duwanaanshuhuna waa kuwa aan Yuhuudda ahayn oo diiday sanamyada. Kuwa aan Yuhuudda ahayn ee ku sugan Falimaha Rasuulladu waxay ahaayeen kuwo ku biiray diinta Yuhuudda oo horeba uga leexday sanamyada. Macnuhu waxa uu tusinayaa iyada oo Bawlos uu jaahiliinta aan Yuhuudda ahayn ka dhex waday adeeg ka wayn kii uu Yuhuudda u hayay.
 5. Goorta uu adeegga wayni ahaa lama hubo maxaa yeelay Bawlos ugu horrayntii wuxuu u tegay Yuhuudda. Markii ay diideen farriintiisa kaddib, ayuu u laabtay dhinaca kuwa aan Yuhuudda ahayn.

Markii ay si wayn uga jawaab celiyeen injiilkana waxa hinaasay Yuhuuddii, waxaanay magaalada ka bilaabeen dhibaato.

- F. Kacdoonka daraaddii ayaa Bawlos uu uga tegay Yasoon gurigiisa isagoo ay wada dhuunteen Timoteyos iyo Siilas, ama ugu yaraan may joogeen markii dadku dhagxiyeen gurigii Yasoon iyagoo raadinaya iyaga. booliskii ayaa sugay ammaanka Yasoon tanina waxa ay Bawlos ku sababtay inuu ka tago magaalada goor habeen ah isagoo u baqoolay Beroya. Si kastaba ha ahaatee, kaniisaddu waxay sii wadday markhaati furisteeda iyadoo aad looga soo horjeeday.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 17:1-9

¹Haddaba markay sii dhex mareen Amfibolis iyo Abollooniya ayay waxay yimaadeen Tesaloniika meeshaas oo sunagogga Yuhuuddu ahaa; ²oo Bawlos sidii caadadiisu ahayd, ayuu iyagii u galay, oo saddex Sabtiyoodna ayuu Qorniinka kala hadlay, ³isagoo caddaynaya oo muujinaya inay waajib ahayd in Masiixu silco oo ka soo sara kaco kuwii dhintay, wuxuuna yidhi, Ciisahan aan idinku wacdiyey waa Masiixa. ⁴Oo waxaa la rumaysiiyey oo Bawlos iyo Silas isku daray qaar iyaga ka mid ah oo ahaa Gariig fara badan oo cibaadaysan iyo dumarka madaxda ah oo aan fara yarayn. ⁵Laakiin Yuhuuddii oo ka masayrsan ayaa nimanka suuqa ka soo kaxaysatay kuwo shar leh, urur bayna isu keeneen, oo magaaladii bay buuq ka dhigeen; oo markay gurigii Yasoon weerareen ayay waxay dooneen inay iyagii dadka u soo saaraan. ⁶Oo markay waayeen, ayay Yasoon iyo kuwo walaalo ah ku hor jiiddeen taliyayaashii magaalada iyagoo ku qaylinaya oo leh, Kuwii dunida rogay ayaa halkanna yimid, ⁷iyagoo uu Yasoon marti geliyey; kuwaas oo dhanna waxay falaan wax ka gees ah amarrada Kaysar, iyagoo leh, Waxaa jira boqor kale oo Ciise ah. ⁸Markaasay dhib geliyeen dadkii badnaa iyo taliyayaashii magaalada oo waxyaalahaas maqlay. ⁹Oo kolkay Yasoon iyo kuwii kale dammiin ka qaadeen, ayay sii daayeen.

K

17:1 “sii dhex mareen Amfibolis iyo Abollooniya” labadan magaalada waxa ay ku yaalleen jidka wayn ee Roomaanka, Jidka Ignatiyaanka (Waddada Quruuma), oo ahayd wadada ugu muhiimsan ee isku xidha bariga iyo galbeedka in ka badan 500 mayl, waxaanay ka dhexeysay qaybaha galbeedka iyo bariga ee boqortooyada iyadoo dariiq muhiimana u noqotay Tesaloniika.

☐ “Tesaloniika” eeg hordhaca cutubkan.

☐ “meeshaas oo sunagogga Yuhuuddu ahaa” kani waxa uu ahaa tusaalaha Bawlos ee wacdintiisa uu samayn jiray (cf. aayadda. 2; 3:26; 13:46; Rooma. 1:16; 2:9,10; Fal 9:20; 13:5,14; 14:1; 17:2,10,17; 18:4,19; 19:8), waxa laga yaab in ugu horrayntii uu dareemay injiilka in lagu wacdiyo Yuhuudda (cf. Rooma. 1:16) waxsii sheegidda Axdiga Hore daraaddeed. Sidoo kale waxa meeshaas joogay kuwa badan oo Ilaah ka cabsada isla markaana ixtiraama Axdiga Hore.

17:2 “saddex Sabtiyoodna” waxa loogala jeedaa inuu ka hadlay sunagoga keliya saddex Sabtiyood. Waxa uu magaalada joogay in ka badan saddex usbuuc (Filiboy 4:16), laakiin uu joogay muddo dheer.

☐ “ayuu Qorniinka kala hadlay” Bawlos waxa uu ka hadlay waxsii sheegyada ku saabsan Masiixa ee la xidhiidha nololaha Ciise, waxbaristiisa, dhimashadiisa, iyo sarakicistiisa. Waxa uu tusaalahan ka raacay Istefanos (Fal 7) iyo tababarkii uu ka qaatay rabbaaniyiinta.

17:3

NASB “isagoo caddaynaya oo muujinaya”

NKJV “sharraxaya oo caddaynaya”

NRSV, NJB “sharraxaya oo muujinaya”

TEV “sharraxaya qorniinka oo caddaynaya”

Ereyga hore waa *dianoigō* kaas oo Ciise adeegsaday markuu Qorniinka u furayay labadii kusii socday Emmaus (cf. Luukos 24:32,45). Sidoo kale waxa loo adeegsaday Ciise oo furay indhohooda inay isaga aqoonsadaan (cf. Luukos 24:31). Ereygan oo kale waxa lagu adeegsaday 16:14 iyadoo Ilaah uu furay qalbiga Ludiya si ay u fahanto injiilka.

Ereyga labaad waa , *paratithēmi*, waxaana badanaa lagu dhex adeegsaday qoraallada Luukos iyadoo qof la hordhigayo cunto, laakiin halkan waxa loogala jeedaa “runta oo la hor dhigo” ama “in la caddeeyo” (cf. 14:23; 20:32). Labo jeer Luukos dhexdiisa cf. 12:48; 23:46) waxa loogu adeegsaday qof oo wax la hordhigo. Bawlos waxa uu si taxadir ku jiro dhegaystayaasha u hordhigay injiilka (i.e., deposit, *parathēkē*, I Timoteyos. 6:20; II Timoteyos. 1:12,14). Qaarna way ka jawaabeen (kuwo Yuhuuda, kuwo Ilaah ka casbada, iyo kuwo ka mida dumarkii madaxda ahaa).

▣ **“inay waajib ahayd in Masiixu silco”** ereyga ah “inuu” (*dei*) waa fal aan dhammaystirnayn oo wax tusinaya, kaasoo sheegaya lagama maarmaanimo (eeg fiirada 1:16). Masiixa silcaya waxa lagu sii sheegay Axdiga Hore (cf. Bilowgii. 3:15; Sabuurka. 22; Ishacyaah. 52:13-53:12; Sekeryaah. 12:10), laakiin rabbaaniyiintu weligood si cad umay arag. Waxa sheegay oo ka hadlay wacdiyayaashii Rasuullada (cf. Luukos 24:46; Fal 3:18; 26:23; I Butros. 1:10-12). Xaqiiqadani waxay ahayd midda ugu muhiimsan ee hortaagnayd Yuhuudda (cf. I Korintos. 1:22-23). Eeg fiirada 3:18.

▣ **“oo ka soo sara kaco kuwii dhintay”** tani waxay ahayd midda ay ku dhex wadaagaan wacdimaha Falimaha Rasuullada ee Butros, Istefanos, iyo Bawlos (qayb ka mida *kerygma*, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14). Waxa weeyi tiirka udub dhexaadka u ah injiilka (I Korintos 15).

▣ **“Ciisahan aan idinku wacdiyey waa Masiixa.”** waxa jira kala duwanaansho badan oo khuseeya qoraal gacmeedyada Giriigga ee ereyada ugu danbeeya weedhan.

1. “Masiixa, Ciisahan” – MS B
2. “Masiixa, Ciise” – kuwo ka mida tarjumaadaha Vulgate iyo Coptiga
3. “Masiix Ciise” – MSS P⁷⁴, A, D
4. “Ciise Masiix” – MS Ⓝ
5. “Ciise Masiixa” – MS E iyo Bohairic Coptiga
6. “Masiixa” – Georgian ka

Culimmo badani waxay doorteen ereyaynta #1 (Vaticanus) waayo aad bay u fiicantahay (UBS⁴ ku wuxuu ku bixinayaa “C”). Dhinaca sunagoga marka laga eego “Masiix” waxa uu macnihiisu noqonayaa Kii Lasubkay ee la ballan qaaday Axdiga Hore, Masiixa (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:31). Waxa jiray saddex xafiis oo lagu subki jiray Axdiga Hore dhexdiisa: boqorrada, nebiyada, wadaaddada. Ciisena waxa uu buuxinayaa saddexda boosba (cf. Cibraaniyada. 1:1-3). Subkitaankani waxa uu calaamad u ahaa doorashada Ilaah iyo u qalabaynta adeegitaanka. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 4:27.

Kaniisaddii ugu horraysay waxa ay si fiican u fahmeen oo bareen in Ciise uu ahaa Masiixii la ballan qaaday (cf. 2:31-32; 3:18; 5:42; 8:5; 9:22; 17:3; 18:5,28), iyadoo raacaya waxyaalihii Ciise uu sida cad u adkeeyay.

17:4 “isku daray” Ficilkan Giriigga ah (fal tegay oo mafcuulku soo horreeyo) halkan oo keliya ayaa laga helayaa Axdiga Cusub dhexdiisa. Macnaha caadiga ahi waa “isku darista koox.” Halkanna waxa ay ku tusinaysaa macnaha ah “raacis” ama “ku biiris.” Axdiga Hore dhexdiisa “kooxdu” waxay ahayd jid lagu garto doonista Ilaah. Waxay ahayd soo jeedinta.

1. meeleyaha (*pros*)
2. asalka (*klēpoō*)
3. mafcuulka soo horreeya ee tusinaya shuqul ilaahi ah.

Ilaaha waxa uu qalbiyadooda u furay sidii Ludiya uu u furay oo kale (16:24; sidoo kale u fiirso fikirka la midka ah ee ku sugan I Butros 5:3).

▣ **“Gariig fara badan oo cibaadaysan”** kuwani waxay ahaayeen kuwii taageersanaa diinta Yuhuudda oo weli aan si buuxda u galin, iyadoo koobsanaysay.

1. in lagudo
2. la baabtiiso
3. macbadka lasiiyo qurbaan marka ay suuro gal noqoto.

▣ **“fara yarayn”** tani waa tusaale kale oo ah Luukos oo adeegsanaya *litotes* (hadal ujeeddo laga wado, cf. 12:18; 15:2; 19:11,23,24; 20:12; 26:19,26; 27:20; 28:2), hadiyo goorna ah qaab diidmo. Halkan waxa loogala jeedaa “aan yarayn,” iyadoo hadalka xaggiisa danbe la dhigay xoojin aawadeed.

▣ **“dumarka madaxda ah”** dumarku waxa ay Makedoniya ku haysteen xorriyad (Ludiya) aanay haysanin dumarkii kale ee ku noolaa bariga dhexe wakhtigaas. Tusaalaha waxa Bisidayadii Antiyokh oo soo noqonaysa (cf. 13:43,45,50). Qoyska qoraal gacmeedyada Giriigga ee reer galbeedku waxa uu weedh ku darayaa aayadda 4 isaga oo sheegaya in dumarkani ay ahaayeen naagihii raggii madaxda ahaa.

17:5 “Yuhuuddii oo ka masayrsan” Yuhuud aan rumaysad lahayn waan ka xumahay (14:2), laakiin masayrku (5:17) isna waa wax laga xumaado! May ahayn dad diin leh oo ujeeddo leh sidii Sawlos, laakiin waxay ahaayeen kuwo hinaasa! Dadkii rumaysadka yeeshay tiradooda (13:45), oon ahayn waxa ay koobsanayso wacdinta ayaa iyaga ka cadhaysiiyay.

Luukos waxa uu badanaa ereyga “Yuhuud” u adeegsanayaa macno tusinaya diidmo (cf. 12:3; 13:45; 14:2; 17:13), sida Bawlos yeelayo oo kale (cf. I Tesaloniika. 2:15-16). Waxa ay la mid yihiin kuwa diida ee hor istaaga injiilka.

▣
NASB “nimanka suuqa ka soo kaxaysatay kuwo shar leh”
NKJV “niman shar leh oo kuwa suuqa ah”
NRSV “kuwo dibjirta suuqa ah”
TEV “kuwa aan faa’idada lahayn ee ciyaala suuqa ah”
NJB “ciyaala suuq”

Waxa ay middani tilmaamaysaa kuwa ciyaala suuqa ah ee bilaa camalka ah, kuwa caajisa oon waxba ku fiicnayn.

▣ **“urur”** ereygan waxa laga helayaa Axdiga Cusub dhexdiisa halkan oo keliya waxaanay aad dhif ugu tahay qoraallada Giriigga. Lagama helayo Sabtuujantiga. “urur” waxa loogala jeedaa macno. Luukos waxa uu ahaa nin aqoon leh oo lahaa erey bixin badan (caafimaad, aqoon guud, iwm.).

17:6 “ Yasoon ku hor jiiddeen” qaarbaa sheega in Yasoon lagu xusay Rooma. 16:21 inuu ninkan yahay laakiin lama hubo.

▣ **“iyo kuwo walaalo ah”** qaab dhismeedku wuxuu tusinayaa in Yasoon ilaa hadda aanu ahayn rumayste. Sida uu Yasoon usoo dhoweeyay kooxda adeegayaasha ahna lama hubo. Waxa suuro gala in

1. Bawlos iyo Siilas ay isaga u shaqaynayeen
2. inay meel ay degaan ka kiraysteen
3. ay joogeen gurigiisa

The VERB welcome in v. 7 means “to receive as a guest” (cf. Luke 10:38; 19:6; James 2:25).

Falka ah soo dhowayn ee aayadda 7 waxa loogala jeeda “marti gelin” (cf. Luukos 10:38; 19:6; Yacquub 2:25).

▣ **“taliyayaashii magaalada”** ereygan “taliyayaal” waxa loogala jeedaa hoggaamiyaha magaalada. Waxa uu ahaa magaca u gaarka ah hoggaamiyaasha dawladda ee Makedoniya. Waa erey aad dhif u ah, waxaana lagu isticmaalay halkan iyo aayadda 8 Axdiga Cusub dhexdiisa, ama suugaanta Giriigga dhexdiisa iyo adeegsigeedu waxa uu tusinayaa Luukos aqoonta uu u lahaa meeshan, waxaanay taageeraysaa taariikhaynta Falimaha Rasuullada (NASB Study Bible, p. 1607, laakiin ereyga waxa laga helay xaradhka jidka Ignatiyanka ee Tesaloniika). Luukos waxa uu ahaa taariikhyahan si sax ah wax usoo gudbinayay. Waxa uu lahaa ujeedo iimaan, kaasi oo rumaystayaasha ay ku sheegaan waxyi.



NASB “Kuwii dunida ka cadhaysiiyay”
NKJV, NRSV
NJB “Kuwii dunida rogay”
TEV “meelwalba dhibka ka sababay”

Waxa ay middani tusinaysaa xukumitaanka ah dhibaato kicin (cf. 21:38; sidoo kale u fiirso 16:20; 24:5). Waa erey xooggan. U fiirso sida uu Bawlos ugu isticmaalayo Galatiya 5:12. Waxa aan ka ognahay I Tesaloniika 2:14-16 in kaniisaddani ay waajahday silcin xooggan.

Waxa lala yaabi karaa haddii tani ay tahay buunbuunin ama ay ogaayeen faafitaanka qayb cusub oo ka mida diinta Yuhuudda.

17:7 “amarrada Kaysar” qaar ayaa u malaynaya in tani ay la xidhiidho Kalawdiyos (C.D. 41-54) ogaysiiskiisii C.D. 49-50 kasoo Yuhuudda caabuditaannadooda Rooma dhexdeeda ka dhigay sharci darro. Ogaysiiskani waxa uu Yuhuuddii ku dhaqdayd Rooma ku sababay ka tagaan. Si kastaba ha ahaatee, waxaan u malaynayaa in macnuhu uu cadyahay isaga oo tusinaya wacdinta injiilka. Waxa sharci darro ahayd in qof Roomaan ah lagu daro diinta Yuhuudda.



“iyagoo leh, Waxaa jira boqor kale oo Ciise ah.” xukunkan waxa sababi kara

1. Wacdintii Bawlos ka sameeyay Tesaloniika ee xoogganayd
2. Ereyada ay Masiixiyiintu u adeegsadeen Ciise ayaa waxay la mid yihiin kuwii Roomaanku u adeegsadeen Kaysar (boqor, rabbi, iyo badbaadiye).

17:8

NASB, TEV “taliyayaashii magaalada”
NKJV “xaakinnadii magaalada”
NRSV “magaalada maamulayaasheedii”
NJB “magaalada taliyayaasheedii”

Eraygan Giriigga ah ee *politarchs*, waxay ahaayeen kuwo sanadkiiba hal mar loo magacaabo magaalada Makedoniya. May ahayn Roomaan balse waxay ahaayeen hoggaamiyayaasha meeshaas u dhashay (AB, vol. 5, pp. 384-389).

17:9 “dammiin” tani waxa ay ahayd wax damaanad ahaan ay u dhigaan rumaystayaasha (aayadaha 4, 6, 10), si ay u damaanad qaadaan in Bawlos aanu mar danbe magaalada wax ku dhex wacdiyin. Qaar ayaa waxa ay middan la xidhiidhiyaan I Tesaloniika 2:18.

NASB (UPDATED) TEXT: 17:10-15

¹⁰Oo markiiba walaalihii waxay habeennimo Bawlos iyo Silas u direen Beroya, kuwaas oo kolkay meeshaas yimaadeen galay sunagogga Yuhuudda. ¹¹Haddaba kuwaasu waa ka sharaf badnaayeen kuwii Tesaloniika joogay, maxaa yeelay hadalkay aqbaleen iyagoo xiiso weyn u qaba oo maalin kasta baadhaya Qorniinka inay hubsadaan waxyaalahaasi inay sidaas yihiin iyo in kale. ¹²Sidaas darteed kuwa badan oo iyaga ka mid ah baa rumaystay iyo dumar Gariig ah oo sharaf leh iyo niman aan fara yarayn. ¹³laakiin kolkii Yuhuuddii Tesaloniika joogtay ogaatay in Bawlos hadalka Ilaah Beroya ku wacdiyey, ayay meeshaasna yimaadeen oo qas iyo dhib geliyeen dadkii badnaa. ¹⁴Markaasaa walaalihii kolkiiba Bawlos u direen inuu tago ilaa badda; Silas iyo Timoteyosna halkaasay weli joogeen. ¹⁵laakiin kuwii Bawlos ambabixiyey waxay isagii keeneen ilaa Ateenay; markaasay ka tageen iyagoo Silas iyo Timoteyos amar u qaadaya inay degdeg u yimaadaan.

17:10 “Beroya” waxay ahayd magaalo wayn wakhtigii Bawlos, iyadoo ku dhawaad 60 mayl dhinaca galbeed ka xigtay Wadadii Ignatiyaanka. Waxa sidoo kale ku noolaa dad Yuhuud ah, qaarna waxay u furnaayeen inay dhegaystaan Bawlos waxyaalaha uu kasoo xiganaya Axdiga Hore.

▣ **“galay sunagoga Yuhuudda”** macnaha tuducu waxa uu tusinayaa inay galeen isla markii ay yimaaddeen, xitaa iyaga oo habeenkii oodhan soo socdaalayey, hadana markiiba waxay galeen sunagoga. Waxa laga yaabaa in ay dhacday maalintii Sabtida ama waxay ogaayeen inay kuwa ku kacsani dabi gali doonaan. Tani waxay ahayd muhiimaddooda, laakiin rumaystayaasha maanta casriga ah ee reer galbeedku waxaad mooddaa in ay lumiyeen muhiimaddii ay lahayd wacdinta!

17:11 “kuwaasu waa ka sharaf badnaayeen” ereygan waxa loo adeegsaday hodantinimada, tacliinta, dabaqadda sare (cf. LXX Ayuub 1:3; Luukos 19:12). Qeexitaankani kuma habboona Yuhuuddii reer Beroya; sidaasi darteedna, waxa lagu shabaha qof aad u raba inuu maqlo fikradaha cusub si ay u qiimeeyaan. Fikirkan furani waxa laga yaabaa inay caan ku ahaayeen dadkii magaalada hoggaaminayay ee sunagoga wax ku caabudi jiray (aayadda 12).

▣ **“maalin kasta baadhaya Qorniinka inay hubsadaan waxyaalahaasi inay sidaas yihiin iyo in kale”** tani waa sida lagu ogaado runta. Qaabka Bawlos wax u wacdinayay waxay ahayd isaga ooo Axdiga Hore wax kasoo xigan jiray isla markaana ku salaynayay Ciise Masiix. Weedha (“inay sidaas yihiin iyo in kale”) waxay wadataa jumlad shuruudeed heerka afraad ah (i.e., *ei iska hubin*, cf. 17:27; 20:16; 24:19; 27:12), waxaanay tusinaysaa waxa xaqiiqada ka baxsan iyo waxa kale. haddaba qaar way ka jawaab celiyeen kuwa kalena maya (qarsoodiga injiilka).

17:12 “kuwa badan oo iyaga ka mid ah baa rumaystay” waxa ay tusinaysaa in kuwo badan oo kamida Yuhuuddii sunagoga iyo kuwii “Ilaah ka cabsiga lahaa” ay ka jawaab celiyeen. Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:16 iyo 2:40.

▣ **“sharaf leh”** ereygan waxa uu ka kooban yahay “wanaag” iyo “qaab” ama “muuqaal.” Waxa loo adeegsaday dadka sharafta iyo saamaynta leh (cf. 13:50 iyo Yuusufkii reer Aremaytiya, Markos 15:43).

17:13 middani waxay tusinaysaa kasoo horjeesashada kaska ah ee Yuhuuddii kasoo horjeesatay Bawlos. Kuwo badan oo kuwani ahi waxay ahaayeen Yuhuud iska dhigaya sidii kuwo diin leh (sidii Sawlos ahaa). si kastaba ha ahaatee, dabeecaddoodu waxay tusinaysaa xaaladdooda ruuxi ahaaneed.

17:14 “ilaa badda” middan waxa loogala jeedi karaa

1. Bawlos wuxuu u socdaalay Ateenay isagoo xeebta doon ku maray coastal boat
2. Bawlos wadada badda ayuu u maray Atenaay

NASB (UPDATED) TEXT: 17:16-21

¹⁶Haddaba Bawlos intuu Ateenay ku sugayay iyagii, ruuxiisu waa kacay markuu arkay magaalada oo sanamyo ka buuxaan. ¹⁷Saas daraaddeed ayuu Yuhuuddii iyo nimankii cibaadaysnaa kula xaajooday sunagoga. suuqa dhexdiisana ayuu maalin walba kula xaajooday kuwii kula kulmayba. ¹⁸Waxaana la kulmay isagii kuwo ka mid ah filosoofiinta Ebikuriyiin iyo Istoo'ikiin ah. Qaar baa waxay yidhaahdeen. Ninkan dawkarka ihi muxuu odhan doonaa? Qaar kalena waxay yidhaahdeen, Wuxuu u eg yahay nin ilaahyo qalaad wax ka sheega; maxaa yeelay, wuxuu dadkii ku wacdiyey Ciise iyo sarakicidda. ¹⁹Markaasay isagii qabteen, oo waxay u kaxeeyeen Are'obagos iyagoo ku leh, Ma ogaan karnaa waxay tahay waxbariddan cusub oo aad ku hadlaysid? ²⁰Waayo, waxaad dhegahayaga maqashiisaa waxyaalo qalaad. Sidaa darteed waxaannu doonaynaa inaannu ogaanno waxyaalahanu waxay yihiin. ²¹(Haddaba reer Ateenay oo dhammi iyo dadkii qalaad oo halkaas degganaa. wakhtigooda wax kale kuma ay dhaafin inay sheegaan ama maqlaan wax cusub mooyaane.)

17:16 “Ateenay” waxa ay ahayd magaalada ugu wayn Giriigga wakhtigii hore ilaa haddana waxay ahayd xarunta fikirka ee dunidii Roomaanka. Waxa ka buuxay waxyaalo badan oo ay ka mid tahay anshax darradu.

▣ **“ruuxiisu”** Qoraal gacmeedyada hore ee Giriigga Axdiga Cusubi ma laha

1. kala sooc ereyada u dhexeeya
2. calaamado higaad ah
3. xarfo la wayneeyo (xarfaha oo dhami waxay ahaayeen kuwo waawayn)
4. kala qaybinta aayadaha iyo cutubyada

Sidaasi darteedna, macnaha oo keliya ayaa tusin kara meesha looga baahanyahay xarafka oo la wayneeyo.

Hadiyo goor xarfaha waawayn waxa loo adeegsaday

1. magacyada ilaahnimada
2. magacyada meelaha
3. magacyada shakhsiyadka

Ereyga “ruux” waxa uu tilmaami karaa

1. Ruuxa Quduuska ah (cf. Markos 1:5)
2. dareenka shakhsiyadda aadanaha (cf. Markos 8:12; 14:38)
3. rooxaanta (i.e., ruuxa aan daahirka ahayn, cf. Markos 1:23)

Macnaha halkan ka muuqdana waxa loogala jeedaa shakhsiyadda Bawlos.

Waxa jira meelo dhowra oo qoraallada Bawlos qaab dhismeedkan naxwe ahaaneed lagu sheegay Ruuxa Quduuska ah ee ka dhex shaqeeya rumaystaha

1. “aan ahayn ruuxa addoonsiga,” “ruuxa ilmo ka dhigashada, Rooma. 8:15
2. “ruuxa sharafta,” I Korintos. 4:21
3. “ruuxa iimaanka (iimaan yeelashada), II Korintos. 4:13
4. “ruuxa xikmadda iyo muujinta,” Efesos. 1:17

Waxa macnaha guud ka muuqata inuu Bawlos “ruux” uu u adeegsanayo isaga oo sheegaya naftiisa ama dadka kale (I Korintos. 2:11; 5:4; II Korintos. 2:13; 7:13; Rooma. 1:9; 8:16; Filiboy. 4:23).

▣

NASB	“waa kacay”
NKJV	“wuu ka cadhooday”
NRSV	“aad buu uuga murugooday”
TEV	“aad buu uga xanaaqay”
NJB	“wuu xanaaqay”

Waa falka aan dhammayska tirnayn oo mafcuulku soo horreeyo ee *paroxuno*, kaasoo asal ahaan loogala jeedo “ka xanaaqid,” laakiin halkan waxa loogu adeegsaday “ka boodid.” Kani waa ereyga (qaabkiisu yahay magac) kaasi oo loo adeegsaday tilmaamista Bawlos iyo Barnabas oo ku dagaallamaya Yooxanaa Markos sida ku sugan 15:39. Waxa dhinaca wanaagsan loogu dhex adeegsaday Cibraaniyada 10:24.

17:17 Bawlos waxa uu danaynayay Yuhuudda (“kula xaajooday sunagogga”) iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn, kuwa diinta Yuhuudda ka helay (Ilaah ka cabsada) iyo kuwo sanamyada caabuda (“suuqa dhexdiisana ayuu maalin walba kula xaajooday”). Bawlos kooxahan kala duwan siyaabo kala duwan ayuu ula xaajooday: kuwa Yuhuudda ah iyo kuwa cibaadada leh waxa uu u adeegsaday Axdiga Hore, laakiin kuwa jaahilka ah waxa uu isku dayay inuu wax guud kala hadlo (aayadaha 22-24).

17:18 “Ebikuriyiin” kooxdani waxay rumaysnayeen in faraxaddu ay ahayd khayrka waxa ugu sarreeya iyo ujeedada nololaha. Waxay rumaysnayeen inaanay nololaha dabadeed jirin nolol kale. astaantoodu waxay ahayd “Nololaha ku farax imika” (qaab hedonism ah). Waxay u qaateen in ilaahyada aanay dadka dan ka lahayn. Magacoodan waxay ka heleen EBikuras, oo ahaa faylosuuf reer Ateenay ah, 341-270 C. H., laakiin waxa ay qaateen waxyaalaha ay natiijadiisu ahayd. Ebikaras farxadda ayuu ka door biday macnaha ballaadhan ee shakhsiga (jidh caafimaad leh iyo maskax fayow). “Waxa la sheegay in Ebikaras uu yidhi, ‘haddii aad rabto inaad ninka ka farxiso, qananimadiisa waxba ha ugu darin, laakiin ka qaado doonistiisa” (*The New Schaff-Herzog Encyclopedia of Religious Knowledge*, vol. IV, p. 153).

▣ **“Istoo’ikiin”** kooxdani waxay rumaysnaayeen in ilaah uu ahaa (1) nafta dunida ama (2) makhluuqaadka oo dhan uu ku dhex jiro. Waxay sheegeen in aadanuhu ay dabeecadda la noolaadaan (ilaah). Sababtu waxay ahayd wanaagga ugu sarreeya. Maamulka nafta, isku fillaanshaha, iyo deganaanta dareen ahaaneed ee xaalad kasata ahi waxa ay ahayd ujeedooda. May rumaysnayn nolosha danbe ee qofka, waxaana aasaasay Zeno, oo ahaa faylosuufar eer Qubrus ahaa isla markaasna u guuray Ateenay sanadku markuu ahaa 300 C.H. waxa ay magacooda ka Heleen xaqqiqaadii uu ku baray *stoa* oo Atenaay ku taalla.

▣ **“dawdarka”** ereygan waxa loo adeegsaday midhaha la cuno ee ku dhex data beeta. Waxa shabahaad ahaan loogu adeegsaday macallimiinta inta ay warbixino meelo kala duwan kasoo ururiyaan kaddibna isku daya inay iibiyaan. *R.S.V. Interlinear* oo uu leeyahay Alfred Marshall ayaa waxa uu ku tarjumayaa “jaahiliin.” NJB guna waxa uu dhigayaa “baqbaaq.”

▣ **“nin ilaahyo qalaad wax ka sheega”** macnaheeda tooska ahi waa *“daimōn qalaad”* waxaana loo adeegsaday macnaha tusinaya aawoodaha ruuxi ahaaneed ama ilaahyada (cf. I Korintos. 10:20-21). Faylosufaradan reer Ateenay waxay ahaayeen kuwo sanamyo caabudo (Olympic pantheon).

1. Waxa suurto gal ah in Giriigtan reer Ateenay ee faylusufarada ahi ay hadalka Bawlos u qaateen inuu sheegayo labo ilaah (*Jerome Biblical Commentary*, vol. 2, p. 199).
 - a. ilaahadda caafimaadka
 - b. ilaahadda sarakicinta (i.e., Anastasis)
2. Xitaa waxa suura gala inay mid u arkeen inuu yahay
 - a. lab (Ciise)
 - b. dhedig (sarakiciddu waa magac dhedig ah)
3. Ereyada injiilka Bawlos (Kitaabka NET) laftoodu waxa laga yaabaa inay ahaayeen kuwo lagu wareerayo marka ay la xidhiidhaan hal Ilaah oo ka kooban saddex shakhsi (i.e., Saddexmidnimada, ka eeg Mawduuca Gaarka ah 2:32).
 - a. Aabbe
 - b. Wiil
 - c. Ruux

▣ **“maxaa yeelay, wuxuu dadkii ku wacdiyey Ciise iyo sarakicidda”** waxa injiilka ka hortaagnaa Yuhuuddu waxa uu ahaa “Masiixa silcaya” xagga Giriigtana waxa uu ahaa “sarakicista” (cf. I Korintos. 1:18-25). Sara kicidda shakhsi ahaaneed iyo nolosha danbe may fahamsanayn Giriigtu manay rumaysnayn in ilaahyada iyo dadkuba nolol danbe noolaanayaan. Waxa ay sheegeen in shakhsi kasta uu ku dhex jiro ilaah jidhkiisa ku dhex xidhan. Badbaadadu waxay ahayd jidhka iyo shakhsiyadda ilaaha la midka ah kala soocistooda.

17:19 “Markaasay isagii qabteen, oo waxay u kaxeeyeen Are'obagos” ereyga *areopages* waxa loogala jeedaa taagga Ates (ilaaha dagaalka). Sanamyadii Roomaanka, ilaaha dagaalka waxa la odhan jiray Maaris. Casrigii dahabiga ahaa ee Ateenay, faylosufarada ayaa magaaladan ka dhigay magaalada fikirka. Magaaladani waxay ahayd magaalo furan iyada oo ay joogaan guddiga hoggaamiyayaasha magaaladu.

Tani waxa ay astaan u tahay wacdintii Bawlos wacdiyay jaahiliinta, sida 13:16 kuwa aan Yuhuudda ahayn ee Ilaah ka cabsada. Ilaahbaa mahad ku leh fariinta Bawlos.

▣ **“Ma ogaan karnaa waxay tahay waxbariddan cusub oo aad ku hadlaysid?”** halkan waxa ah farqiga u dhexeeya kuwa caqliga adeegsada (aayadaha 20-21) iyo waxyiga. Ilaah waxa uu inaga dhigay kuwo wax isa su’aala (cf. Wacdiyihii. 1:8-9,18; 3:10-11), laakiin dadku ma keeni karaan nabad iyo farxad. Injiilka oo keliya ayaana sidan samayn kara! Bawlos waxa uu ka hadlayaa farqiga u dhexeeya xikmadda dadka iyo waxyiga Ilaah sida ku sugan I Korintos 1-4.

17:19-20 Ereyadani waa kuwo aad u leh dhaqan. Waxa laga dhadhansanayaa aqoon heer sarraysa.

17:21 Aayaddani waxay u muuqataa faallo qoraagu bixinayo. Waxay tusinaysaa akhlaaqda ku jirta aayadaha 19-20 oon ahayn caqli runa oo keliya, laakiin ah qaab dhaqaneed. Waxay iyagu ku faraxsanaayeen dhegaysashada iyo doodda. Waxay isku dayayeen dib u nooleeyaan ammaantii Ateenay ee hore. Dhibaataada hadaba waxay ahayd iyagoon kala sooci karin xikmadda aadanaha iyo waxyiga ilaahiga ah (maantana sidaas oo kale weeyi aqoonteena

NASB (UPDATED) TEXT: 17:22-31

²²Markaasaa Bawlos oo Are'obagos dhex taagan wuxuu yidhi, Nimankiinan reer Ateenay ahow, wax kasta waxaan idinku garanayaa inaad tihiin kuwo ilaahyada ka cabsada. ²³Waayo, markaan soo socday oo aan arkay waxyaalaha aad caabuddaan waxaan soo arkay oo kale meel allabari oo lagu qoray, Waxaa leh ilaah aan la oqoon. Haddaba waxaad oqoonla'aanta ku caabuddaan ayaan wax idiinka sheegayaa. ²⁴Ilaaha sameeyey dunida iyo waxyaalaha ku jira oo dhanba, oo ah Rabbiga samada iyo dhulka, ma deggana macbudyo gacmo lagu sameeyey, ²⁵gacmo dadna looguma adeego sidii isagoo wax u baahan, maxaa yeelay. dhammaan isagaa siiya noloshu iyo neefta iyo wax walbaba: ²⁶oo quruun kasta oo bini-aadmi ah ayuu isaga mid dhigay inay dunida dusheeda oo dhan degganaadaan isagoo gooyay xilliyadu hore u diyaarshay iyo xadadka degmooyinkooda; ²⁷inay Ilaah doondoonaan. in hadday suurtowdo ay haabhaabtaan oo ay helaan isaga, in kastoo uusan ka fogayn midkean kasta; ²⁸maxaa yeelay, isagaynu ku nool nahay, kuna soconnaa, kuna jirnaa; sidaasoo kuwo ka mid ah gabayayaashiinnu ay yidhaahdeen, Weliba innaguna waxaynu nahay farcankiisa. ²⁹Haddaba innagoo ah Ilaah farcankiis waa inaynaan ka fikirin in Ilaahnimadu ay la mid tahay dahab ama lacag ama dhagax oo lagu xardhay sanacada iyo farsamada dadka. ³⁰Haddaba wakhtiyaashii oqoonla'aanta Ilaah baa dhaafay, laakiin hadda wuxuu dadka ku amrayaa in dhammaantood meel kastaba ha joogeen ay soo tobad keenaan; ³¹maxaa yeelay, wuxuu dhigay maalin uu dunida si xaq ah ugu xukumi doono ninkuu doortay, taasoo uu dhammaan ugu caddeeyey saraki cidda uu isagii ka soo sara kiciyey kuwii dhintay.

sare)!

17:22 “inaad tihiin kuwo ilaahyada ka cabsada.” Waxa loogala jeeda “ka cabsada ilaahyada (*daimōn*).” Waxa middani ay noqon kartaa (1) macno diidmo ah, “aan caqli gal ahayn” sida King James Version, ama (2) xagga wanaagsan, “aad daacad uga ah ku dhaqanka diinta” (NKJV, NJB cf. 25:19).

Nimankani waxay lahaayeen maskax iyagoo tix gelayay waxyaabaha la xidhiidha diimaha, laakiin ku salaysan iyaga oo qudha (dhaqamadooda).

▣ “wax kasta” Fiiri u yeelo inta jeer ee wacdintan dhexdeeda uu Bawlos ku isticmaalayo “wax kasta” ama waxyaalo la mid ah.

1. “waxkasta ku garanayaa,” aayadda. 22
2. “waxkasta,” aayadda. 24
3. “nolol iyo neef kasta” aayadda. 25
4. “wax kasta,” aayadda. 25
5. “quruun kasta,” aayadda. 26
6. “dhulka oo dhan,” aayadda. 26
7. “mid kastoo inaga mida,” aayadda. 27
8. “anagu” (labo jeer), aayadda. 28
9. “meel kasta,” aayadda. 30
10. “dunida” (dadka dhulka deggan), aayadda. 31
11. “dadka oo dhan,” aayadda. 31

Warka wanaagsan ee Bawlos waxa uu ahaa in Ilaah jeclaaday dadka oo dhan (ka sameeyay, cf. Bilowgii. 1:26-27) waxaanu siiyay jid ay isaga ku gaartaan (i.e., ujeedada asalka ah ee abuuritaanka oo ahayd weheshiga Ilaah, cf. Bilowgii. 3:8) iyo in la cafiyo (i.e.,saamaynta leexashada, cf. Bilowgii. 3).

17:23 “allabari oo lagu qoray, Waxaa leh ilaah aan la oqoon.” Giriigtu waxay ka cabsanayeen inay illaaween ama ay ka tegeen caabudada ilaah muhiim ah oo laga yaabo inuu ku sababo dhibaato, sidaasi darteedna, si joogto ah ayay waxyaalaha noocana uga taxadiri jireen (cf. Pausanias, *Description of Greece* 1:1:4 iyo Philostratus, *Life of Apollonius* 6:3:5). Waxay ka cabsi qabeen xukunka ruuxiga ah iyo sanam caabudistooda.

▣ **“Haddaba waxaad oqoonla'aanta ku caabuddaan”** waxa jira erey ku shaqeeya “aan lagaranayn” (*agnōetō*) iyo “aqoon la'aan” (*agnoountes*). Ereyga Ingiriisida ah ee “agnostic” na waxa uu ka yimid ereygan Giriigga ah. Bawlos waxa uu injiilka uga warramayay kuwan jaahilka ah ee rumaysnaa nafta ku dhex jirta dunida.

▣ **“ayaan wax idiinka sheegayaa”** Bawlos waxa uu si cad u tusinayaa inaanu ahayn “dawdar” (aayadda 18) iyo inuu garanayo Ilaah sare ee ay iyagu jaahilka ka yihiin.

17:24 “Ilaaha sameeyey dunida iyo waxyaalaha ku jira oo dhanba” Bawlos waxa fiqi ahaan ugu horreeya ee uu tilmaamayaa waa Ilaah oo ah abuuraha (cf. Bilowgii. 1-2; Sabuurka. 104; 146:6; Ishacyaah. 42:5). Giriigtu waxay aaminsanaayeen in ruuxa (Ilaah) iyo maaddadu (atamka) ay yihiin labo wada jira. Bawlos waxa uu Bilowgii 1 ku sheegayaa fikirka abuuritaanka halkaasoo Ilaah uu si ujeeddo ah u abaaray samaayinka iyo dhulka labadaba (dunidan iyo caalamka).

▣ **“ma deggana macbudo gacmo lagu sameeyey,”** waa xigasho ka ahaatay (1) Axdiga Hore (cf. I Boqorradii 8:27; Ishacyaah. 66:1-2) ama (2) faylosufar Giriig ah, Euripides, Fragment 968. Waxa jira xigashooyin dhowra oo halkan ku sugan kana ahaaday qoraayaashii Giriigga (cf. aayadaha.25 & 28). Bawlos sidoo kale waxa uu aqoon u lahaa Giriigta qoraalladooda.

17:25 “sidiis isagoo wax u baahan” fikirkan mid la mida waxa laga helayaa (1) Euripides buuggiisa *Heracles* 1345f; (2) Plato buuggiisa *Euthyphro* 14c; (3) Aristobulus, Fragment 4; ama (4) Sabuurka 50:9-12. Macbadyada Giriigtu waxa ay ahaayeen meelaha badanaa ilaahyada lagu quudiyo ee lagu daryeelo.

▣ **“dhammaan isagaa siiya nolosha iyo neefta iyo wax walbaba”** waxa laga yaabaa in middani ay u laabanayso Ishacyaah 42:5. Waxa weeyi sidiis Bawlos uu fiqi ahaan u sheegayay (1) jacaylka Ilaah u qabo aadanaha (naxariista iyo nimcada) iyo (2) Ilaah oo waxkasta siiya dadka. Xaqiiqadan mid la mida waxa sameeyay Zeno, oo ahaa asaasaha dugsigii Istoo'ikiinka, sida ku xusan Clement ga Iksandariya, *Stromateis* 5:76:1. Fiiri u yeelo “autos,” laftiisa! Waa xaqiiqo la yaableh in ay maqlaan jaahiliintani oo aqbalaan.

17:26 “ayuu isaga mid dhigay” qoraal gacmeedyada Giriigga ah ee galbeedka la qoyska ahi waxa ay ku dayaan “isku dhiig.” Si kastaba ha ahaatee, qoraal gacmeedyada Giriiggu P⁷⁴, a, A iyo B ereygan way ka tegayaan (UBS⁴ ku wuxuu jaritaankeeda ku bixinayaa “B” isagoo ku tirinaya [hubaal]). Haddii ay asal ahaan tilmaamayso Aadan. Haddii ay u noqonayso Giriigta faylosufiyadooda waxa ay ka hadlaysaa midnimada aadanaha oo isku meel kasoo jeeda. Weedhan iyo midda ku xigtaa waxay si cad u sheegayaan sinnaanta aadanaha oo dhan (waxa laga yaabaa inay u noqonayso, Malaakii. 2:10, ama LXX ka Sharciga Kunoqoshadiisa. 32:8), fiqi ahaanna waxay sheegaysaa in aadanuhu yihiin kuwo laga sameeyay ekaanshaha Ilaah (cf. Bilowgii. 1:26-27).

Inta ka hadhsan aayaddani waxa laga yaabaa inay u noqonayso waxyaalaha ku sugan Bilowgii. Dadka waxa lagu amray inay tarmaan oo dhulka buuxiyaan (cf. 1:28; 9:1,7). Dadku waxay noqdeen kuwo aan rabin inay soocmaan oo dhulka camiraan. Taalladii Baabeloon (cf. Bilowgii. 10-11) waxay tusinaysaa Ilaah oo sameeyay arrintan.

▣ **“isagoo gooyay xilliyadu hore u diyaarshay iyo xadadka degmooyinkooda”** Bawlos waxa uu sheegayaa in Ilaah aanu abuurin waxkasta oo keliya, laakiin uu wax walba jiheeyo. Waxa laga yaabaa in middani ay u noqonayso Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8 (LXX). Si kastaba ha ahaatee, xaqiiqadan waxa lagu sheegay meel kasta oo Axdiga Hore ah (cf. Ayuub 12:23; Sabuurka. 47:7-9; 66:7).

17:27 weedha hore waxa laga yaabaa inay tahay xigasho kale oo ka ahaatay gabayada Giriigga, Aratus.

▣ **“in”** waa jumlad shuruudeed heerka afraad ah, taasi oo ka dhigan xaqiiqada laga fogaado. Aadanuhu waa inay aqoonsadaan waxay u baahan yihiin. Labada falbana waa fal tegay.



NASB, NKJV,

NRSV

TEV

NJB

“inay Ilaah doondoonaan”

“inay dareemeen isaga”

“ay raadiyaan jidkii ay u mari lahaayeen”

Ereygan waxa loogala jeedaa “la xidhiidhaan” ama “dareemaan” (cf. Luukos 24:39). Macnaha halkani waxa uu tusinayaa ku dhex raadinta mugdiga ama wareerka. Waxay iyagu isku dayayaan inay Ilaah helaana, laakiin ma fududa. Jaahilnimadu waa awood indho la’aan ah oo leexashada calaamad u ah, sida sanam caabudista iyo waxa la midka ahiba sameeyaan (Rooma 1-2), laakiin Ilaah wuxuu joogaa!

▣ **“in kastoo uusan ka fogayn midkeen kasta”** Waa xaqiiqo layaab leh. Ilaah wuu ina abuuray, Ilaah inaguu inoo ahaaday, Ilaah wuu inala jiraa (Sabuurka 139!) Bawlos waxa uu tilmaamayaa jacaylka Ilaah, dareelkiisa, iyo isagoo aadanaha oo dhan la jooga. Tanina waa runta ku jirta injiilka (cf. Efesos. 2:11-3:13).

Waxa laga yaabaa Bawlos inuu si dadban u sheegayay Sharciga Kunoqoshadiisa. 4:7 ama Yeremyaah. 23:23-24, laakiinse uu ku dabaqayo dadka oo dhan. Tanina waa sirta qarsoodiga ah ee Axdiga Cusub.

17:28 “kuwo ka mid ah gabayayaashiinnu ay yidhaahdeen” Weedh hore, “isagaynu ku nool nahay, kuna soconnaa, kuna jirnaa” waa xigasho ka ahaatay

1. Cleanthes’ *Hymn to Zeus*. Waxa uu ahaa madaxa dugsiga Istoo’ikiin ka laga bilaa 263-232 C.H. ama

2. Aratus’s (reer Soli, magaalo u dhow Tarsus) *Phainomena*, line 5. Aratus wuxuu ahaa reer Silisiya waxaanu noolaa 315-240 C.H. xigashadani waxay xoojinaysaa mid ahaan

a. Ilaah awooddiisa (cf. aayadda. 27) ama

b. Ilaah oo abuuray aadanaha oo dhan (cf. aayadda. 26).

Bawlos sidoo kale wuxuu ku soo xiganayaa Epicureans I Korintos 15:32 iyo Menander, *Thais*, sida ku sugan I Korintos. 15:33. Bawlos waxa uu bartay qoraallada Giriigga, isagoo ka ku bartay Tarsus, oo ahayd meesha ugu muhiimsan ee aqoonta laga helo.

▣ **“Welib innaguna waxaynu nahay farcankiisa.”** Tani waa xigasho kale, waxa laga yaabaa inay ka ahaatay Epimenides, waxaana kusoo xigtay Diogenes Laertius *Lives of the Philosophers* 1:112.

17:29 Tani waa midda uu Bawlos kusoo gaba gabaynayo waxa ku saabsan sanam caabudista (cf. Sabuurka. 115:-18; Ishacyaah. 40:18-20; 44:9-20; 46:1-7; Yeremyaah. 10:6-11; Xabaquuq. 2:18- 19). Dhibaataada aadanaha leexday waxay weeyi, iyaga oo xaqiiqada ruuxiga ah ka raadiya waxyaalo aan maqli karin, u jawaabi karin, ama caawin karin!

17:30 “wakhtiyaashii oqoonla'aanta” Tani waa dhinac la yaab leh oo ku saabsan naxariista Ilaah (cf. Rooma. 3:20,25; 4:15; 5:13,20; 7:5,7-8; I Korintos. 15:56). Laakiin hadda way maqlayn injiilka ruuxi ahaana waa kuwo masuul ah!

▣ **“hadda wuxuu dadka ku amrayaa in dhammaantood meel kastaba ha joogeene”** hadalkani waxa uu sheegayaa

1. inuu jiro hal Ilaah

2. Aadanaha oodhami meel kasta ha joogeenee wuxuu ka rabaa towbad keen.

Waxa ay tusinaysaa caalaminimada naxariista iyo jacaylka Ilaah (cf. Yooxanaa 3:16; 4:42; I Timoteyos. 2:4; Tiitos 2:11; II Butros. 3:9; I Yooxanaa 2:1; 4:14). Caalaminimadani maaha in cid kastaa badbaaday (cf. aayadaha. 32-33), laakiin waxa loogala jeedaa iyada oo Ilaah uu rabo in dadka oo dhami towbad keenaan iskuna halleeyaan Ciise xagga badbaadada. Ciise waxa uu u dhintay dhammaan daka! Cid kastaana way badbaadi kartaa! Qarsoodiga sharka ayaa laakiin ah in dhammaan aanay wada badbaadayn!

▣ **“toobad keenaan”** ereyga Cibraaniga ah waxa macnihiisu yahay “bedelitaanka ficil,” halka ereyga Giriigga ahi uu ka sheegayo “bedelitaanka maanka.” Labaduba waa muhiim. Labada dugsi ee faylosufiyadda laguna sheegay aayadda 18 middan way diidi lahayd, laakiin sababo kala duwan daraaddood. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Towbadkeenka 2:38.

17:31 “maxaa yeelay, wuxuu dhigay maalin uu dunida si xaq ah ugu xukumi doono” Bawlos farriintiisu waxay si cad oo soo noqnoqonaysa u sheegay naxariista Ilaah iyo waxa uu qabto. Laakiin tani waa badh ka mida farriinta. Ilaaha jacaylka iyo naxariistu sidoo kale waa Ilaah caddaalad sameeya oo raba xaqnimo. Dadka uu ka sameeyay ekaanshihiisu waxa ay noqon doonaan kuwo lagu xisaabiyo hadiyadda nolosha (i.e., Sabuurka. 96:13; 98:9). Axdiga Cusubi wuxuu sheegayaa in Ilaah uu dunida xukumi doono (dunida la yaqaano) waana mid in badan soo noqnoqonaysa (ex. Matayos. 10:15; 11:22,24; 16:27; 22:36; 25:31-46; Muujintii. 20:11-15).

▣ **“ninkuu doortay”** Fikirkan la xidhiidha Maalinta Qiyaamuha wuxuu ku salaysan yahay iimaankkeenna la xidhiidha nin la sara kiciyay, oo ah Ciisihii reer Naaseret (adeegaha YHWH ee xukunka), waxa uu ahaa mid aanay maqlin oo la yaab ku ahaa Giriigta (cf. I Korintos. 1:23), laakiin waa qalbiga markhaati furka injiilka (cf. 10:42; Matayos. 25:31-33).

▣ **“ugu caddeeyey saraki cidda uu isagii ka soo sara kiciyey kuwii dhintay.”** Ujeeddadan marar badan ayaa lagaga hadlay Falimaha Rasuullada (cf. 2:24,32; 3:15,26; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30,33, 34,37; 17:31). Waa arrinta udub dhexaadka u ah injiilka oo ah in Ilaah Aabbaha ahi, aqbalay nolosha, waxbarista, iyo dhimashada beddelka ah ee Ciise. Waxbarista ugu buuxda ee mawduuca (1) Ciise sarakiciddiisa iyo (2) sarakicidda rumaystayaashu waxa weeyi I Korintos 15.

NASB (UPDATED) TEXT: 17:32-34

³²Haddaba kolkay maqleen wax ku saabsan ka soo sarakicidda kuwii dhintay, qaar waa ku qosleen, laakiin qaar kale waxay yidhaahdeen, Mar kale ayaannu waxan kaa maqli doonnaa. ³³Haddaba Bawlos waa ka dhex tegey iyagii. ³⁴laakiin niman baa raacay isagii oo rumaystay; kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Diyonusiyoos kii Are'obagos, iyo haweenay la odhan jiray Damaris, iyo kuwo kale oo la socdayba.

17:32 “kolkay maqleen wax ku saabsan ka soo sarakicidda kuwii dhintay” Giriigtu marka laga reebo Ebikariyiinta, waxay rumaysnaayeen anshax darrada nafta, laakiin aan jidhka ahayn. sara kicidduna waxay ahayd waxa ugu muhiimsanaa ee hortaaqnaa Giriigta (cf. aayadda. 18; I Korintos. 1:23).

▣ **“qosleen”** ereygan halkan oo keliya ayaa lagaga isticmaalay Axdiga Cusub dhexiisa, laakiin waxa waa qaab ka muuqanaya Fal 5:30 iyo 26:21. Asalkeeda (*chleusma* ama *chleusmos*) waxa lagu dhex isticmaalay Sabtuujantiga marar badan iyadoo loo adeegsaday “jeesjees” ama “ka riwaayadsasho” (cf. Ayuub 12:4; Sabuurka. 79:4; Yeremyaah. 20:8).

▣ **“laakiin qaar kale waxay yidhaahdeen, Mar kale ayaannu waxan kaa maqli doonnaa.”** Farriinta Bawlos ee ah jacaylka Ilaah ee u ahaaday dadka oo dhan iyo daryeelkiisi waxa uu ahaa arrin iyaga ku cusub wayna ka heleen, laakiin si buuxda ugumay qancin.

17:34 “niman baa raacay isagii oo rumaystay; kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Diyonusiyoos” Waxa jira saddex ka jawaab celineed oo u ahaaday injiilka:

1. diidmo, “qaar way ku qosleen” (aayadda. 32)
 2. go'aan dib dhaca, “mar kale ayaannu waxan kaa maqli doonnaa” (aayadda. 32)
 3. rumays, “niman baa raacay Bawlos oo rumaystay” (aayadda. 34; I Tesaloniika. 1:9-10)
- Tani waxay la mid tahay masaalka beerrayda (cf. Mateyos 13).

▣ **“Diyonusiyos kii Are'obagos”** Waxa uu hadiyo goor ula joogi jiray waxyaalaha faylosufiyiintu falaqaynayaan ee ku saabsan Taagga Maaris. Ugu yaraan mid ka mida kuwa caqliga adeegsado ayaa rumaysad yeeshay.

Eusebius, *Eccl. His.* 3:4:6-7 iyo 4:23:6 ayaa sheegaya inuu noqday wadaadkii ugu horreeyay ee Ateenay ama Korintos. Haddii ay runtahay, waa is beddel wayn! Injiilku waxa uu ku jiray shaqo is bedel samaynasa.

SU'AALO FALQAYN AH.

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu Bawlso u dhaafay magaalooyin waawayn oo muhiima sida Ambifobolis iyo Aboloniya?
2. Maxay silcitaanka Masiixa uga cadhoonayeen Yuhuuddu?
3. Maxay Boreya u jawaab celinteeda injiilku u ahayd dhiirri gelin wayn?
4. Muxuu Bawlos sida wanaagsan uuga hadlay xaaladdii ruuxi ahaaneed ee reer Ateenay?
5. Maxay wacdinta Bawlos ee Maaris dusheedu muhiim u ahayd? (aayadaha 22-24).

FALIMAHA RASUULLADA 18

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos oo jooga Korintos	Ka adeegitaankii Korintos	Korintos oo kaniisad laga aasaasay	Korintos dhexdeeda	Korintos oo kaniisad laga aasaasay
18:1-4	18:1-17	18:1-4 18:5-11	18:1-4 18:5-8 18:9-11	18:1-4 18:5-11 Yuhuuddii oo Bawlos maxkamadeeyay
18:12-17		18:12-17	18:12-13 18:14-17	18:12-17
Bawlos wuxu ku laabtay Antiyokh	Bawlos oo Antiyokh ku laabtay	Dhammaadkii socdaalkii labaad iyo bilowgii kii saddexaad	Kulaabashadii Antiyokh	Ku laabashadii Antiyokh iyo u bixitaankii socdaalka saddexaad
18:18-23	18:18-23	18:18-21 18:22-23	18:18-21 18:22-23	18:18 18:19-21 18:22-23
Abolloos oo Efesos wax ka wacdiyay	Adeeggii Abolloos	Abolloos oo jooga Efesos	Abolloos oo jooga Efesos iyo Korintos	Abolloos
18:24-28	18:24-28	18:24-28	18:24-28	18:24-26 18:27-28

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA**NASB (UPDATED) TEXT: 18:1-4**

¹Waxyaalahaas dabadeed Ateenay ayuu ka tegey, oo wuxuu yimid Korintos. ²eeshaasna wuxuu ka helay Yuhuudi Akula la odhan jiray, oo reer Bontos ah, oo mar dhow haweenaydiisa Bariskilla kala yimid Itaaliya, maxaa yeelay, Kalawdiyos baa ku amray Yuhuudda oo dhan inay Rooma ka tagaan; wuuna u yimid iyagii. ³Isaguna la shuqul buu ahaa, sidaas darteed ayuu ula joogay iyagii, wayna shaqeeyeen; waayo, xagga shuqulkooda waxay ahaayeen taambuug-sameeyayaal. ⁴ Oo wuxuu sabti walba sunagogga kula doodi jiray oo soo jeedin jiray Yuhuud iyo Gariigba.

18:1 “Ateenay ayuu ka tegey, oo wuxuu yimid Korintos” Korintos waxay 50 mayl dhinaca galbeed ka xigtay Ateenay iyadoo ku taalla dhul siman. Bawlos wuxuu keli ku ahaa Ateenay oo xitaa sidoo kale wakhti yar Ateenay (aayadda 5). Bawlos waxa ay dhibaato ka haystay xagga indhaha (II Korintos 12). Aad bay ugu adkayd inuu keli ahaado.

MAWDUUC GAAR AH: MAGAALADA KORINTOS

- A. Koonfurta Giriiggu xilliyada jiilaalka (Cape Malea) waxay ahayd mid khatar ah. Haddaba, dhul la maro oo dariiqa ugu gaaban ahi aad buu muhiim u ahaa. Juquraafi ahaan meesha ay ku taallay Korintos waa dhul afar mayl siman una dhexeeya Khalijka Korintos (Badda Adriatica) iyo Khalijka Saronik (Badda Agiyanka) oo magaalada ka dhigay xarun ganacsi (xarun wax laga dhoofiyo oo xagga gacansiga muhiim u ah) iyo xarun milatari. Maalmihii Bawlos halkani waxay ahayd ahayd meesha ay ku kulmaan dhaqamada Bariga iyo Galbeedku.
- B. Korintos sidoo kale waxay ahayd xarun muhiim u ah dhaqamada dunidii Giriigga iyo Roomaanka maxaa yeelay waxay marti gelin jirtay Ciyaarihii Isthmiyaanka ee sanad laha ahaa kuwaasoo bilaabmay sanadkii 581 C.H. (Macbadkii Bosidon). Ciyaarihii Olobika ee Ateenay oo keliya oo ahaa sanadkiiba hal mar, ayaa siiyay muhiimadda (Thucydides, *Hist.* 1.13.5).
- C. Sanadkii 146 C.H. ayaa Korintos waxa ay ku lug lahaayeen kacdoon (Ururkii Akiyaanka) kasoo horjeeday Rooma waxaana baabiiyay Genaraalkii Roomaanka ee Lukiyas Mumiya halkaasoo dadkii lagu faquuqay. Muhiimadda dhaqaale iyo milatari ahaaneed aawadeed ayaa waxa dib loo dhisay mid ahaan sanadihii 46 ama 48 C.H. waxaana dhisay Julius Caesar. Waxa ay noqotay mustacmarad Roomaan ah halkaasoo ay ku hawl gabi jireen askarta Roomaanku, sidoo kalena waxay ahayd xarunta dhaqan iyo maamul oo ah Roomaanka gobolka Akiya sanadkii 27 C.H. waxa ay noqotay Gobol Boqortooyo sanadkii C.D. 15.
- D. Korintistii Hore iyadoo dhulka ka sarraysay 1880 dhudhun, waxay ahayd meesha laga arko macbadka Aphrodite. Waxa macbadkan ku xidhnaa 1000 dhillooyin (Strabo, *Geography*, 8.6.20-22). In loogu yeedho “Korintos” (i.e., *Korinthiazesthai*, coined by Aristophanes [450-385 B.C.]) waxay la mid ahayd in la dabciyo nolol fawdo ah. macbadka intii aanu iman Bawlos ka hor 150 sano waxa baabiiyey dhulgariir, sidii markaleba uu dhul gariirku u burburiyey sanadkii C.D. 77. Waxa aan lahubin haddii dhaqanka sidan ahi uu sii socday wakhtigii Bawlos. Maadaama oo Roomaanku, sanadkii 146 C.H. ay magaalada baabiiyeen isla markaasna ay laayeen dadkii deganaa, dadkii Giriigga ahaa ee magaalada waxa bedelay gumaysigii Roomaanka (Pausanias, II.3.7).

18:2 “Yuhuudi Akula la odhan jiray...Bariskilla” Naagtiisa, Bariskilla, hadiyo goor iyada ayaa ugu horrayn la sheegay (cf. 18:18,26; I Korintos. 16:19; II Timoteyos. 4:19), hadiyo goorna dhaqankan caadi kumay ahayn (eeg Mawduuca Gaarka ah: Dumarka ku sugan Kitaabka 2:17). Magaceedu wuxuu waxa uu la mid yahay magaca

qoys Roomaana oo hodan ah. Weligeed laguma sheegin Yuhuudiyad. Waa sheeko jacayl oo la yaableh haddii ay ahayd gabadh Roomaana oo hodan ah isla markaasna jeclaatay Yuhuudi cashuur qaade ah ama ka shaqeeya haragga! Waxa ay si wada jira gacansiga ugala shaqaynayeen Bawlos, sidoo kalena waxay caawiyeen Abolloos oo xer ahaa.

▣ **“mar dhow”** sida ku sugan *A Translator’s Handbook on the Acts of the Apostles*, p. 347, Newman and Nida waxa uu qorayaa wax ku saabsan fal kaabahan, *prospatos*. Asal ahaan macneheedu waa “mardhow la dilay,” laakiin shabahaad ahaan ayaa loogu adeegsan karaa “mardhow.” Tani waa tusaale wanaagsan oo ah sida isu ekaysiintu aanay hadiyo goor u ahayn mid tusinaysa macnaha saxda ah ee wanaagsan. Ereyada waa in loo fahmo hadiyo goor macnaha ay tuduc ahaan ku tusinayaan. Kuwo badan oo ka mida qaladaadka loo fasiro Kitaabkuna waxa uu ka yimaadda mufasiriinta casriga ah oo si qaldan u fahma ereyadii wakhtiyadii hore ee maldahaadda loo adeegsaday.

▣ **“haweenaydiisa Bariskilla kala yimid Itaaliya, maxaa yeelay, Kalawdiyos baa ku amray Yuhuudda oo dhan inay Rooma ka tagaan”** sida ku xusan *Historia Contra Paganus* 7.6.15, Orosiyas waxa uu sheegayaa in taariikhda amarkani uu ahaa C.D. 49. . Suetonius, in *Life of Claudius* 25.4, waxa uu inoo sheegayaa in kicinta Yuhuuddu ay ahayd mid ka mida bilowgii *Chrestus*. Roomaanku waxay ku wareereen oo ay isku qaldeen Christus iyo Chrestus (cf. Tacitus, *Annals* 25:44:3). Dio Cassius in *Histories* 60.6, waxa uu sheegayaa in Yuhuudda aan la musaafurinin, laakiinse laga mamnuucay inay sameeyaan caadooyinkooda.

Falka ah “kala yimid,” waa fal mafcuulku soo horreeyo oo tusinaya in socodka loo maleeyay mid ahaa wakhti dheer. Kalawdiyos amarkiisu waxa weeyi fal dhammays tiran oo uu soo horreeyo mafcuulku.

18:3 “Isaguna la shuqul buu ahaa” Middan waxa hadiyo goor loo malaynayay dakhli, laakiin ereygu waxa uu tilmaamayaa ka shaqaynta haragga. Bawlos asalkiisa ah rabbaanigu waxa uu ka dalbanayay inuu haysto shaqo caadi ah ama ganacsi. Muu jirin rabbaani lacagta ku qaadan jiray waxbarista dadka. Silisiya oo ahayd meeshuu deegaan ahaanta u lahaa Bawlosna waxa la sheegay in laga heli jiray hargaha riyaha.

18:4 “Oo wuxuu sabti walba sunagogga kula doodi jiray” Bawlos waxa uu shaqayn jiray Sabti kasta isagoo “la doodaya” iyo isagoo “isku dayaya inuu qanciyo” (labada falba waa kuwo aan dhammaystirnayn). Bawlos ugu horrayntii wuxuu u tegay Yuhuudda maxaa yeelay

1. wuxuu ahaa tusaalaha Ciise (cf. Matayos. 10:5-6)

2. waxay yaqaaneen Axdiga Hore

3. Giriigtii cibaadada lahaa guud ahaan waxay ahaayeen kuwo ka jawaab celiya farriintiisa (cf. Rooma. 1:16)

Sunagogu wakhtigii musaafurinta Baabiloonka wuxuu ahaa meel caabudaad, waxbarasho, iyo tukasho. Waxa loo sameeyay oo loo hagaajiyay dhaqanka Yuhuudda.

NASB (UPDATED) TEXT: 18:5-11

⁵laakiin markii Silas iyo Timoteyos Makedoniya ka yimaadeen, hadalka ayaa haystay Bawlos isagoo Yuhuudda hortooda ka sheegaya in Ciise yahay Masiixa. ⁶Oo markay is-hor taageen oo caytameen, isagu dharkiisuu hurgufay oo ku yidhi iyagii, Dhiiggiinnu madaxiinna ha dul ahaado; anigu nadiif baan ahay, hadda ka dib waxaan u tegi doonaa dadka aan Yuhuudda ahayn. ⁷Markaasuu meeshaas ka tegey, oo wuxuu galay gurigii ninka Tiitos Yuustos la odhan jiray. kaasoo Ilaah caabudi jiray, oo gurigiisu ku xigay sunagogga. ⁸Markaasaa Kirisbos oo sunagogga u sarreeyey baa Rabbiga rumaystay, isaga iyo kuwii gurigiisa oo dhanba; kuwo badan oo reer Korintos ahna ayaa markay maqleen rumaystay, oo waa la baabtiisay. ⁹Haddaba Rabbiga ayaa wuxuu Bawlos habeennimo riyo ku yidhi, Ha cabsanin, laakiin hadal. hana aamusin; ¹⁰maxaa yeelay, anaa kula jooga, ninnana kuma dhici doono inuu wax ku yeelo, waayo, dad badan baan magaaladan ku leeyahay. ¹¹Meeshaasna sannad iyo lix bilood ayuu joogay, oo wuxuu dhexdooda barayay hadalka Ilaah.

18:5 “markii Silas iyo Timoteyos Makedoniya ka yimaadeen” Waxa ay keeneen jacayl deeq ah oo ka socday rumaystayaashii joogay Filiboy, kuwaasoo Bawlos u oggolaaday inuu wakhti buuxa wax ka wacdiyo (cf. II Korintos. 11:9; Filiboy. 4:15). Timoteyos sidoo kale waxa uu keenay war ku saabsan kaniisadda Tesaloniika isaga oo ka jawaab celinaya wixii Bawlos uu ku qoray I Tesaloniika iyo II Tesaloniika (17:14). Waxay u muuqataa, sidii Luukos uga tegay kale Filiboy isagoo u tegay inuu xer cusub keeno, ayaa Timoteyos uu ka tegay Tesaloniika, Siilasna uu ka tegay Boreya. Bawlos waxa uu aad u danaynayay tabo barista Masiixiyiinta cusub (Adeegga Wayni waa samaynta iyo waxbarista xerta, oon ahayn go’aanno keliya). Waxa uu doonay inuu magaalo kasta oo uu booqdo uu kaga tago kaniisad shaqaynaysa, koraysa, oo waxsoo saarna leh.



NASB “hadalka ayaa haystay Bawlos”
NKJV “Bawlos waxa xoojinayay Ruuxa”
NRSV “Bawlos waxa uu ku sii mashquulsanaa hadalka”
TEV “Bawlos wakhtigiisii oo dhan wuxuu ku wacdinayay farriinta”
NJB “Bawlos wakhtigiisii dhan wacdin ayuu kusii haystay”

Qoraal gacmeedyo Giriigga ah ayaa ku kala duwan weedhan. Qoraalka ugu qadiimisan uguna wanaagsani wuxuu dhigayaa mafcuulka aan tooska ahayn ee *Logos* (cf. MSS P⁷⁴, a, A, B, D, E, waafaqsan Vulgate ka, Peshitta ka, iyo tarjumaadda Qubtiga). UBS⁴ ku wuxuu ku tirinayaa “B” (hubaal). Textus Receptus ku waxa uu dhigayaa “Ruux” (*pneumati*), kaasi oo laga helayo qoraal gacmeedyada Minuscule Greek ga (saddex ka mida qarniga tobnaad waa kuwa ugu qadiimisan).

▣ **“isagoo Yuhuudda hortooda ka sheegaya in Ciise yahay Masiixa.”** Waxaad is barbar dhigtaa 9:22 iyo 17:3 oo khusaysa qaabka Bawlos ee qancinta ah (falka aan dhammayska tirnayn ee *sunechō*, oo macnihiisu yahay wax ku qancin ama ku xoojin), kaasi oo aad ugu eeg qaabkii Istefanos (Fal 7). Eeg fiirada 2:40. Arrintan fiqi ahaaneed ee markasta lagusoo celcelinayay (Ciise oo ah Masiixa, eeg sharaxa ama fiirada 17:3) waxa ay fure u tahay kuwa kale oo dhan!

18:6 “is-hor taageen oo caytameen” Waa labo fal oo mafcuulku soo horreeyo, kaasi oo xoojinaya falka ay shakhsi ahaaneed ee lagusii socday. Nasiib darro tani waxa ay ahayd badanaa jawaabtii ka imanaysay Yuhuuddii Qurba joogga ahayd.

▣ **“isagu dharkiisuu hurgufay”** tani waxay ahayd calaamad Yuhuuddu u isticmaalaan diidmada (cf. Nexemyaah. 5:13; Fal 13:51; Luukos 9:5; 10:11). Eeg fiirada ama sharraxa buuxa 13:51.

▣ **“Dhiiggiinnu madaxiinna ha dul ahaado”** Waa erey duur xul ah oo waxyaalo dhowra la xidhiidha.

1. masuuliyadda ilaaliyaha, keli ahaan iyo jamac ahaan, Yexesqeel. 3:16ff; 33:1-6
2. masuuliyad shakhsi ahaaneed, Yashuuca. 2:19; II Samuu’eel. 1:16; Yexesqeel. 18:13; Fal 18:6; 20:26
3. masuuliyada iskaashi ee faca ama quruumaha, II Samuu’eel. 3:28-29; II Boqorradii. 2:33
4. Isku darka Axdiga Cusub ee # 2 iyo #3, Matayos. 27:25

Noloshu waxay ku jirtay dhiigga (cf. Laawiyyiintii. 17:11,14). Daadinta dhiiggu waxay qofka ka dhigaysay inuu dhimashadaas darteed Ilaah ugu yahay masuul (cf. Bilowgii. 4:10; 9:4-6).

▣ **“anigu nadiif baan ahay”** Tani waxa weeyi misaal Axdiga Hore ah oo tusinaysa qurbaanka iyo masuuliyadda shakhsi ahaaneed. Bawlos intaas wax dhaafsiisan ruuxi ahaan masuul (Yexesqeel 33) kamuu ahayn Yuhuuddu inay maqlaadan joogtaa inay maqlaan injiilka. Isagu wuu la wadaagay farriinta iyaguna kamay jawaabin. Innagu ma nahay nadiif?

▣ **“hadda ka dib waxaan u tegi doonaa dadka aan Yuhuudda ahayn.”** Nidaamkan wacdin ahaaneed waxa uu caadi u noqday Bawlos (cf. 13:46; 18:6; 26:20; 28:28). Bawlos waxa uu dareemay inay waajib ku tahay inuu ugu horrayn wacdiyo Israa’iliyiinta si ay Ciise u raacaan (cf. Matayos. 10:6; 15:24; Markos 7:27). Waxa uu middan fiqi ahaan ku sharraxayaa Rooma. 1:3,5,9-11 iyo caadifad ahaan Fal 9:15; 22:21; 26:17 (cf. Rooma. 11:13; 15:16; Galatiya. 1:16; 2:7-9; Efesos. 3:2,8; I Timoteyos. 2:7; II Timoteyos. 4:17).

18:7 “Tiitos Yuustos” Waxa jira dhowr waxyaalood oo suurta gala isla markaasna khuseeya magacaabistan “caabudaha Ilaah” oo ku noolaa meel ku dhegsan sunagogii ku yaallay Korintos.

1. Magaciisa Buuxaa waa Gaius Tiitos Yuustos iyadoo kaniisaddii Korintosna ay kula kulantay gurigiisa (cf. Room. 16:23).
2. Waxa laga yaabaa inuu yahay Gaius ka lagu sheegay I Korintos. 1:14 kaasoo uu Bawlos baabtiisay.
3. Waxa jira kala duwanaansho qoraal gacmeedka Giriigga ah oo la xidhiidha magacan.
 - a. *Titou Ioustou*, MSS B, D² (UBS⁴ waxa uu ku bixinayaa “C”)
 - b. *Titou Ioustou*, MSS 8, E, P
 - c. *Ioustou*, MSS A, B², D*
 - d. *Titou*, Peshitta iyo tarjumaadda Qubtiga.

▣ **“kaasoo Ilaah caabudi jiray”** Qoraal ka ahaaday Aphrodisias (qarnigii 3aad), ayaa isticmaalaya weedha ah “Ilaah caabudi jiray” isagoo u adeegsanaya kuwa aan Yuhuudda ahayn ee ku xidhnaa sunagoga. Haddaba, “kuwo cibaado leh” (10:1-2,22; 13:16,26) waxa ay la mid tahay “Ilaah caabude” (cf. 13:50; 16:14; 18:6-7).

Weedhan qeexitaankeedu wuu adagyahay, isla weedhana waxa loo adeegsaday Ludiya sida ku xusan 16:14 iyo kuwo kale oo Giriig ah sida ku xusan Tesaloniika 17:4 iyo Boreya sida ku xusan 17:17. Waxay u muuqdaan inay yihiin Giriig ka helay diinta Yuhuudda oo sunagogana xaadiray marka ay suurto gal u noqoto, laakiin aan si rasmi ah ugu biirin diinta Yuhuudda. Si kastaba ha ahaatee, weedha “kuwo diinta Yuhuudda ku biiray oo cibaado leh” waxa loo isticmaalay iyada oo sheegaysa kuwa sida buuxda ugu biiray diinta Yuhuudda ee Berga dii Bamfiliya 13:43.

18:8 “Kirisbos” ninkani waxa uu ahaa ninka nidaamiya ee masuulka ka ah sunagoga (cf. I Korintos. 1:14).

▣ **“baa Rabbiga rumaystay, isaga iyo kuwii gurigiisa oo dhanba”** Falimaha Rasuulladu waxa uu diiwaan gelinayaa dhacdooyin dhowra oo madaxa qoyska iyo gurigiisa oo dhanba la baabtiisay (cf. 11:14; 16:15,31-34; 18:8, ka eeg Mawduuca Gaarka ah: Baabtiiska 2:38). Reer galbeedku waxay illaaween meesha iyo halka uu ka lahaa qoyska ballaadhani dunidii hore ee Barigadhexe. Qoysku waxa uu ahaa muhiimadda, kelinimada lama jeclayn. Inkasta oo tani ay ka duwantahay fahankeenna kelinimada ku dhisan ee wacdinta, taasi kama dhigayso mid xaqiiqadiisu aanay habboonayn ama yartahay.

Si kastaba ha ahaatee, sidoo kale waa in loo fiirsado in dhammaanba xubnaha qoyska ee kaniisadda xaadiray ay badbaadeen. Onesimus waxa uu addoon ka ahaa Filemon gurigiisa oo ay kaniisaddu ku kulmi jirtay, laakiin muu badbaadin ilaa Bawlos kula kulmayo xabsiga dhexdiisa.

Waxa ku saabsan “rumaystay” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 2:40 iyo 3:16.

▣ **“kuwo badan oo reer Korintos ahna ayaa markay maqlen rumaystay, oo waa la baabtiisay.”** Kuwo badan oo joogay Korintos ayaa aqbalay farriinta Bawlos, laakiin Bawlos wuu niyad jabay waxaanu u baahna inuu tamar ku helo muuhin ilaahi ah oo gaar ah (aayadda 10b). Kaniisadaha Korintos (kaniisad guriyeed) waxay ahaayeen kaniisadaha ugu adag ee dhibku kaga imanayay Bawlos. Isagu wuu jeclaa iyaga, laakiin waxay ku sababeen xanuun caafimaad oo wayn (I iyo II Korintos).

Waxa jira macno la xidhiidha oo la mida midkan isla markaasna ku sugan I Korintos. 1:14-17. Waxa aan halkan kusoo daray mid kamida sharaxaadahayga ka ahaaday I Korintos. Ka eeg www.freebiblecommentary.org

1:17 “Waayo, Masiixu iima uu soo dirin inaan dad baabtiiso. Laakiin wuxuu ii soo diray inaan dadka injiilka ku wacdiyo” Middan loogalama jeedo in baabtiiska laga tago, laakiin sida loola fal galo ruuxa kaniisadda Korintos ayaa waxa ay soo jeedinaysay hoggaamiyayaal khaas ah. Si kastaba ha ahaatee, hadalku ma sheegayo in baabtiiska aan loo arkin “calaamad” u adeegaysay nimcada. Waxa layaableh iyada oo qaar ay qoraallada Bawlos u fasiraan macno calaamad ah marka uu qoraalladiisa oo dhan si gaara ugu sheegayo Cashada Rabbiga mar keliya sida ku xusan I Korintos 11 iyo baabtiiska oo uu labo jeer xusayo sida ku xusan Rooma. 6:1-11 iyo Kolosay. 2:12. Si kastaba ha noqotee, baabtiisu waa doonista uu Ilaah la rabo rumayste kasta.

1. waa tusaalihii Ciise
2. waa amarkii Ciise

3. waa waxa laga filayo ee nidaamka u ah rumaystayaasha oodhan.

Ma rumaysni in ay ay tahay waxa tusinaya helitaanka nimcada Ilaah ama Ruuxa. Waxay ahayd jaaniska fagaaraha ay rumaystayaasha cusubi ku sheegi jireen kuna caddayn jireen iimaankooda. Ma jiro rumayste Axdiga Cusub oo su'aalaya, "In la ibaabtiso ma waajib baa si aan u badbaado?" Ciise wuu sameeyay! Ciise waxa uu kaniisadda ku amray inay sameeyaan! Samee!" Baabtiisku waxa weeyi qofka oo fagaare ku qirta rumaysadkiisa, gaar ahaan marka la dhexjoogo dhaqamada aan Masiixiyiinta ahayn.

18:9 "Ha cabsanin," Waa fal amar ah oo ay la socoto diidmo mafcuulku soo horreeyo, taasi oo ka dhigan joojinta fal hore u socday. Waxa laga yaabaa in middani ay u noqonayso Bilowgii. 26:24 ama Sharciga Kunoqoshadiisa. 1:29-33; 20:1, halkaas oo Isxaaq uu ku cabsanayay. Bawlos wuu cabsoonayay waxaanu u baahna dhiirri gelinta Masiixa. Luukos waxa uu qorayaa riyoooyinkan gaarka ah ee ah dhiirri gelinta ku sugan 22:17-18; 23:11; 27:23-24. Haddii nin sida Bawlos oo kale ah uu daalo, miyay ku yaab gelinaysaa in adiguna aad sidaasoo kale samayso? Ciise sidoo kale wuu inala jiraa (cf. aayadda. 10; Matayos. 28:20)! Adeegga wayni waxa uu ilaa hadda ilaalinayaa ujeedada ugu muhiimsan (cf. Matayos. 28:18-20; Luukos 24:47; Fal 1:8).

▣ **"laakiin hadal. hana aamusin"** labadaniba waxa weeyi ficillo amar ah (fal amar ah oo wakhti xaadirka jooga iyo mid tegay). Cabsidu waa in aanay aamusiinin qofka faafinaya injiilka! Caadifaddeenu marna way kacdaa marna hoos ayay u dhacdaa, laakiin Fal 1:8 ayaa ilaa hadda ah iftiinka wax hagaya (cf. II Timoteyos. 4:2-5).

18:10 "anaa kula jooga" Ma jiro ballan qaad midkan ka wayni (cf. Bilowgii. 26:24; Baxniintii 3:12; 33:4; Sabuurka. 23:4; Matayos. 28:20; Cibraaniyada. 13:5). Fiiro u yeelo Isaga oo inala jira, maaha u qalbi dejin iyo ammaan siin, laakiin waa dhiirranaanta wacdinta aawadeed (sidaasoo kalena waxa ka dhigan ka buuxsamidda Ruuxa ee ku sugan Falimaha Rasuullada). Joogitaanka Ruuxu waxa uu u ahaaday faafinta, mana aha nabadda shakhsi ahaaneed oo keliya.

▣ **"waayo, dad badan baan magaaladan ku leeyahay"** Weedha "dad badan baan leeyahay" waxa ay u noqonaysaa Axdiga Hore oo u adeegsaday Israa'iil (dadka Ilaah), laakiin imika Axdiga Cusub dhexdiisa waxa ay ku sheegaysaa kuwo jooga Korintos (Yuhuud iyo kuwo aan Yuhuud ahayn) kuwaas oo ka jawaab celin doona injiilka. Ma jiri doonto kala qaybsanaan Yuhuud ama Giriig ahi (cf. Rooma. 3:22; I Korintos. 12:13; Galatiya. 3:28; Kolosay. 3:11). Kaniisadda hadda waxa loogu yeedhay magacyo Axdiga Hore ah (cf. Galatiya. 6:16; I Butros. 2:5,9; Muujintii. 1:6).

Tani waxa weeyi xoojinta Ilaah ee ku saabsan qadarka iyo cilmiga qaybka (Rooma 9; Efesos 1). Aheey, haddii aan awoodi kari lahayn inaan daalacano ama aragno kitaabka Nollosha hadda! Markhaatufurka kaniisaddu waa wax ku ool(Muujintii 13:8). Damaanad qaadka shakhsi ahaaneed wuxuu u ahaaday ku dhiirrashada wacdinta, mana aha ansixinta tigidh lagu janada marka ay rumaytayaashu dhintaan!

18:11 Aayaddani waxay gacan ka gaysanaysaa asaasitaanka taariikhda suurto galka ah ee socdaalladii adeegga ahaa ee Bawlos. Inkasta oo weedhu aanay caddayn, waxa ay ka tarjumaysaa ka adeegitaankii Korintos muddo dhan sideed iyo toban bilood.

NASB (UPDATED) TEXT: 18:12-17

¹²laakiin kolkii Galliyo ahaa taliyaha Akhaya, Yuhuuddii oo isku qalbi ah baa ku kacday Bawlos, oo waxay hor keeneen kursigii xukumaadda iyadoo leh, ¹³Ninkanu wuxuu dadka yeelsiiyaa inay Ilaah u caabudaan si sharciga ka gees ah. ¹⁴laakiin kolkii Bawlos u dhowaa inuu afkiisa kala qaado ayaa Galliyo Yuhuuddii ku yidhi, Kuwiinan Yuhuudda ahow, xaajadii hadday tahay xaqdarro ama xumaan shar ah, sababtaas waan idiinku dul qaadan lahaa; ¹⁵laakiin hadday yihiin su'aalo ku saabsan hadallo iyo magacyo iyo sharcigiinna, idinka qudhiinnu fiiriya, maxaa yeelay, anigu dooni maayo inaan waxyaalahaas xaakin u ahaado. ¹⁶Markaasuu iyagii ka eryay kursigii xukumaadda. ¹⁷Kolkaasay kulligood waxay qabteen Sostenees oo sunagogga u sarreeyey, wayna ku garaaceen isagii kursigii xukumaadda hortiisa. Galliyona dan kama gelin waxyaalahaas.

18:12 “Galliyo” Ilaah kitaabiga ah iyo kuwa dheeraadka ahba waxaan ka baranaynaa in kani uu ahaa hoggaamiye caddaalad sameeya. Walaalkiis Seneca, waxa uu isaga ka leeyahay “Xitaa kuwa jecel walaalkay Galliyo u jecel sida ugu wayni si ku filan isaga uma jecla” iyo “nina sidii Galliyo oo kale marna uma fiicnayn.” Sheegitaanka arrintan siyaasadeed waxay inaga caawinaysaa inaan taariikhayno socdaalladii Bawlos. Waxa uu taliye ahaa labo sano iyo badh oo ka bilaabmayay sanadkii C.D. 51.

▣ **“Galliyo ahaa taliyaha Akhaya”** Luukos waa taariikhyahan sax ah. Magacyada saraakiisha Roomaanka ee meeshani waxay is beddeleen ilaa C.D. 44; “taliye” (cf. 13:7; 19:38) waxay ahayd sax waayo Boqor Kalawdiyos waxa uu gobolkan siiyay guddida.

▣ **“Yuhuuddii oo isku qalbi ah”** Luukos waxa uu weedhan adeegsanayaa marar badan isaga oo sheegaya midnimada rumaystayaasha (cf. 1:14; 2:1,46; 4:24; 5:12; 8:6; 15:25), laakiin halkan waxa ay ku tusinaysaa ku midoobitaanka hinaasaha iyo kasoo horjeesashada injiilka ee ay sameeyeen Yuhuuddii Korintos (aayadda 6). Tusaalayaasha kale ee adeegsiga weedhan oo tusinaysa macno diidmo ahi waa 7:57; 12:20; iyo 19:29. Ereyga “Yuhuud” badanaa qoraallada Luukos waxa uu ku tusinayaa macno diidmo ah.

▣ **“oo waxay hor keeneen kursigii xukumaadda iyagoo leh,”** Waa ereyga *bēma* (macnaha caadiga ah, “tallaabo”). Waxa uu ahaa kursiga Roomaanka ee caddaaladda (cf. Matayos. 27:19; Yooxanaa 19:13; Fal 25:6,10,17; II Korintos. 5:10).

18:13 “inay Ilaah u caabudaan si sharciga ka gees ah” Yuhuuddu waxay sheegeen in Masiixiyaddu ay fawdaynaso sharciyadooda, sidaas darteedna, ka mid ahaan la’aanta diinta Yuhuuddu waxay ahayd arrin sharciyeed oo aad muhiim u ah. Haddii Galliyo uu xukunkan ku qaadi lahaa, Masiixiyaddu waxay noqon lahayd diin aan sharci ahayn. laakiin sida ay ahayd, Masiixiyaddu waxay haysatay ilaalo siyaasadeed (waxa loo arkayay qayb ka mida diinta Yuhuudda) oo ay ku haysatay sharcigii Roomaanka ilaa lagasoo gaadho silcintii Nero, 10-12 sanadood kaddib.

Waxa xitaa suurto gal ah in ujeedooyinka uu Luukos u qoray Falimaha Rasuullada ay ka mid ahayd Masiixiyadda oon khatar ku ahayn xukuumadda Roomaanka. Waxa la sheegay in sarkaal kasta uu xaqiiqadan garawsanaa.

18:14 “hadday” Waa jumlad shuruudeed heerka labaad ah. Waa qaab dhismeed dhif ah isla markaasna hadal been ka dhigaysa is muhiimadda loo gaadho ama falaqayntu usii socoto. Waxa badanaa loogu yeedhay shuruud “liddi ku ah xaqiiqada.” Waxa middan loo tarjumi karaa “haddii ay tahay denbi ama wax qalad ah, iyadoon ahayn, markaa waxay noqonaysaa in aan idinkana idinku daro, sidaasna maaha.”

18:15 “hadday” tani waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah. Arrinta sharci ahaaneed xaqiiqadii waxay ahayd, arrin la xidhiidha diin. Galliyo waxa uu si xikmadi ku jirto u aqoonsaday ujeedada dhabta ah ee Yuhuudda. Muu xukumi doonin waxna kamuu qaban doonin waxyaalaha sidan oo kale ah.

18:16 “Markaasuu iyagii ka eryay” Halkani waa meesha keliya ee falkani uu kagasoo dhex aroorayo Axdiga Cusub, laakiinse marar badan ayaa lagu adeegsaday Sabtuujantiga dhexdiisa (cf. I Samuu’eel. 6:8; Yexesqeel. 34:12). Waxa weeyi qaabka xoojinta ah ee *elaunō*, kaasi oo loogala jeedo in xoog wax lagu eryo.

18:17 “Kolkaasay kulligood waxay qabteen Sostenees” “kulligood” waxa ay tilmaamaysaa Yuhuudda aayadda 12 ama waxa suuro gala Giriigta, taasi oo tusinaysa kasoo horjeesashada Sematiga ee magaaloooyinka Giriigta. Sostenees waxa lagu lagu dhex sheegay I Korintos 1:1, inay isku mid yihiinna lama hubo, laakiinse waa magac dhif ah. Sosteneeskani waxa uu qaatay Booskii Kirisbos isagoo hoggaamiye u ah sunagoga. Sababta ay Yuhuuddu u garaacayeenna lama hubo. Waxa laga yaabaa in sababtu ahayd isaga oo Bawlos u oggolaaday inuu ka hadlo sunagoga.

▣ **“Galliyona dan kama gelin waxyaalahaas.”** Hoggaamiyahan siyaasadeed ee Roomaanka ahi isagoo la mid ahayn Bilatos, muu maqli doonin dadka badani waxay sheegayaan.

NASB (UPDATED) TEXT: 18:18-21

¹⁸Markaasaa Bawlos maalmo badan sii joogay, dabadeed ayuu walaalihii ka tegey, oo wuxuu u dhoofay Suuriya, isagoo ay la socdaan Bariskilla iyo Akula, wuxuuna Kenekhreya hore ugu xiirtay madaxa, maxaa yeelay, nidar buu galay. ¹⁹Markaasay waxa; yimaadeen Efesos, oo halkaasuu iyagii kaga tegey; laakiin isagu wuxuu galay sunagogga oo la dooday Yuhuuddii. ²⁰Oo markay weydiisteen inuu wakhti ka sii dheer joogo, ma uu oggolaan; ²¹laakiin markuu ka tegey ayuu ku yidhi, Mar kalaan idiin soo noqon doonaa haddii Ilaah doonayo, markaasuu Efesos ka dhoofay.

18:18 “Kenekhreya” Tani waxay ahayd mid ka mida labadii dekadood ee Korintos. Waxa ay ku taallay Badda Aegiyaanka, dhinaca bari ee bannaanka u dhow halkay ku taallay Korintos. Waxa mar labaad lagu sheegay Rooma 16:1.

▣ **“nidar buu galay”** Waxa middani ay tilmaamaysaa taariikh ahaan nidarka Nazarite ee lagu sheegay Tirintii 6:1-21 (cf. F. F. Bruce, *Answers to Questions*, p. 52). Bawlos markale ayuu middan ku samaynayaa Fal 21:24 (eeg sharraxaadda halkaas). Jaritaanka ama xiiritaanka madaxu wuxuu tusinayaa dhammaadka nidarka.

A. T. Robertson iyo M. R. Vincent ayaa u malaynaysa in midkani aanu ahayn nidar Nazarite waayo waxay ku koobnayd oo keliya Yerusaaalem marka loo eego caadada Yuhuudda. Bawlos wax kasta wuxuu u sameeyay inuu cid ku guulaysto (cf. I Korintos. 9:19-23). Wax aan hubin karnaa in nidarkani uu u ahaa wacdinta, oonu sharci u ahaanin! Sidoo kalena waxa jirta suurta galnimo ah in uu ahaa Akuilla kii madaxa xirtay.

18:19 “Efesos” Waxay ahayd magaalo ganacsi oo wayn kuna taalla galbeedka Aasiyada Yar. Kaddib markii Miletus uu baabi’iyay bacaad ka yimid Wabiga Naeaner, ayaa xaruntii ganacsigu waxay u gurtay xagga xeebta Efesos, taasoo sidoo kale lahayd dekad dabiici ah. Wakhtiga Axdiga Cusub maalmihii ugu wanaagsanaa ee Efesos waxay ahaayeen kuwo tegay. Waxa ay ilaa hadda ahayd magaalo wayn oo saamayn leh, laakiin aan lahayn ammaantii wakhtiyadii hore ay lahayd.

1. Waxay ahayd magaalada ugu wayn gobolkii Roomaanka ee Aasiyada Yar. May ahayn caasimadda in kasta oo xaakinka Roomaanku uu halkaas ku noolaa. Waxay ahayd xarun ganacsi sababtuna waxay ahayd iyadoo lahayd dekad dabiici ah.
2. Waxay ahayd magaalo xora, taasi oo loo oggolaay inay lahaato dawlad hoose iyo xorriyad badan oo ay ka mid ahayd askar Roomaan ah oon joogin.
3. Waxay ahayd magaalada keliya ee loo oggolaay in lagu qabto ciyaaraha sanad laha ah ee Aasiyaanka.
4. Waxay ahayd meesha uu ku yaallo Macbadka u ahaa Artemis (Laatiinku waa Diyana), kaasi oo kamid ahaa todobada mucjiso ee dunida wakhtigiisii. Waxay ahayd 425' x 220' oo leh 127 tiir oo dherarkoodu yahay 60; 86 ka midana waxa lagu qurxiyay dahab (eeg Pliny's *Hist. Nat.* 36:95ff). Muuqaalka Artemis waxa loo malaynayay meel muuqaalkeeda ay ka muuqdaan naago naasohoodu qaawanyihiin. Waxa middan loogala jeeda iyadoo ay halkaas joogeen dhillooyin badani (Fal 19). Waxa ay ahayd meel aad anshaxu ugu yar yahay oo dhaqamo badani ku noolyihiin.
5. Bawlos waxa uu magaaladan joogay in kabadan saddex sanadood (cf. Fal 18:18ff; 20:13).
6. Dhaqanku wuxuu sheegayaa inay noqotay meeshii uu deganaa Yooxanaa kaddib markii ay Maryan ay ku dhimatay Falastiin.

▣ **“isagu wuxuu galay sunagogga oo la dooday Yuhuuddii.”** Bawlos wuu jeclaa dadkiisa (cf. Rooma. 9:1-5). Waxa uu isku dayay isagoon ku guul darraysanayn inuu iyaga gaadhsiiyo injiilka.

18:20 Yuhuuddani waxay la mid ahaayeen reer Boraya. Waxay rabeen inay dhegaystaan. Sababta uu Bawlos aanu u rabin inuu joogana laguma sheegin qoraalka, laakiin sida ku sugan aayadda 21 waxa ay doonistiisu ahayd inuu kusoo laabto jihataynta Ilaah maalin kale.

18:21 “Mar kalaan idiin soo noqon doonaa haddii Ilaah doonayo” Bawlos wuxuu rumaysnaa in noloshiisu ay ku jirto gacanta Ilaah, oonu isagu is maamulayn (cf. Rooma. 1:10; 15:32; I Korintos. 4:19; 16:7). Tani waa aragtida kitaabiga ah ee ku saabsan dunida (cf. Cibraaniyada. 6:3; Yacquub 4:15; I Butros. 3:17). Bawlos wuu soo laaban doonaa iyada oo Efesos ay tahay meesha ugu muhiimsan ee diiradda uu saarayo socdaalkiisa saddexaad.

NASB (UPDATED) TEXT: 18:22-23

²²Oo markuu Kaysariya ku soo degay, ayuu wuxuu u aaday oo salaamay kiniisadda, markaasuu Antiyokh aaday. ²³Markuu intii mudda ah meeshaas joogayna, wuu ka tegey, markaasuu meel meel u sii dhex maray dalalka Galatiya iyo Farugiya isagoo xertii adkaynaya.

18:22 Aayadda 21 waxay ku dhammaanaysaa Bawlos oo ka shiraacanaya Efesos. Aayadda 22 waxa weeyi isaga oo soo caga dhiganaya Falastiin (Kaysariya) isaga oo booqanaya kaniisadda Yerusaaalem (“wuxuu u aaday” fiqi ahaan hadlaya) kaddibna wuxuu yimid Antiyokh dii Suuriya. Waa in la xusuusnaado Luukos in aanu diiwaan gelinayn maalin walba waxa dhacayay, balse uu kolba u boodaya meesha muhiimaddu ku jirto. Falimaha Rasuulladu maaha taariikh casri ah, laakiin waa taariikh saxa oo wanaagsan! Aayadda 22 waxay ku dhammaanaysaa socdaalkii labaad iyadoo aayadda 23 iyana ay ku bilaabmayso socdaalkii adeeg ee saddexaad.

▣ **“kiniisadda”** Ka eeg Mawduuca Gaarka ah 5:11.

▣ **“dalalka Galatiya iyo Farugiya”** Weedhan ah “dalalka Galatiya” waxa weeyi arrin ay isku khilaafsan yihiin culimmadu haddii ay sheegayso kala qaybintii cirqi ama siyaasad ahaaneed ee ka dhex taagnayd meesha maanta ah Turkiga.

Gobolka Farugiya ugu horrayn waxa lagu sheegay 2:10. Kuwo ka mid ahii kuwii waayo aragnimada u yeesha Bentakostiga ayaa ka socday goobtan. Bawlosna waxa laga mamnuucay inuu meeshan wax ka wacdiyo sida ku sugan 16:6.

Waxa lala yaabi karaa weedha ah “isagoo xertii adkaynaya” ee ugu danbaysa aayadda 23 ay sheegayso haddii ay kuwani yihiin kuwii maalintii Bentakostiga rumaysadka yeeshay ama ay yihiin kuwii rumaysadka ku yeeshay wacdinta Bawlos markuu joogay Derbe, Lustara, iyo Ikoniyum, oo ahaa qaybta koonfureed ee gobolkii Roomaanka ee Galatiya. Tani waa bilowga socdaalkii saddexaad ee Bawlos (cf. 18:23-21:16).

▣ **“isagoo xertii adkaynaya.”** Bawlos waxa uu qaatay Adeegga Wayn ee Matayos. 28:19-20. Adeegitaankiisu wuxuu isugu jiray wacdin (cf. Matayos. 28:19) iyo xer ka dhigis (cf. 15:36; Matayos. 28:20).

NASB (UPDATED) TEXT: 18:24-28

²⁴Haddaba waxaa Efesos yimid Yuhuudi Abolloos la odhan jiray oo reer Iskanderiya ahaa. oo wuxuu ahaa nin hadalyaqaan ah, oo Qorniinka garasho xoog leh u leh. ²⁵Ninkaas jidka Rabbiga hore baa loo baray; oo isagoo ruuxa ku kulul ayuu ku hadlay oo hagaag u baray waxyaalihii Ciise ku saabsanaa, isagoo garanaya baabtiiskii Yooxanaa oo keliya; ²⁶oo wuxuu bilaabay inuu geesinimo kaga dhex hadlo sunagogga. Laakiin Bariskilla iyo Akula, markay maqleen isagii, ayay kaxaysteen, kolkaasay aad ugu sii caddeeyeen jidka Ilaah. ²⁷oo markuu damcay inuu u sii dhaaf Akhaya, ayaa walaalihii dhiiro geliyeen, oo waxay xerta u qoreen inay soo dhoweeyaan isagii; markuu yimidna aad buu u caawiyey iyagii, kuwaasoo nimco ku rumaystay, ²⁸maxaa yeelay. si xoog leh ayuu Yuhuuddii u garansiiyey oo caddaan ugu tusay Qorniinka in Ciise yahay Masiixa.

18:24-28 Tani waxay u muuqataa inay tahay diiwaan gelin la xidhiidha midkood

1. Birisilla iyo Akuwayla
2. xertii Yooxanaa Baabtiisaha (taariikh ahaan isuguma xigto)
3. iyadoo ah waraaq uu Bawlos kula talinayo Abolloos.

18:24 “Yuhuudi Abolloos la odhan jiray” Waxa aan caadi ahayn iyada oo Yuhuudi dabadiis la magacaabo ilaah Giriig ah. waxa uu isagu ahaa nin leh aqoon sare (cf. 18:24-19:1). Adeegii uu ka waday Korintosna waxa uu ahaa mid waxtar leh, laakiin wacdiyanimadiisu saddex waxyaalood oo ay ku shaqaynaso (taageeryaasha Bawlos, Butros, Abolloos, cf. I Korintos. 1-4) ayaa ka dhigtay geesigooda. Waxa uu diiday inuu ku laabto Korintos (cf. I Korintos 16:12).

▣ **“oo reer Iskanderiya ahaa”** Tani waxay ahayd magaalada labaad ee ugu wayn Boqortooyadii Roomaanka, waxaanay caan ku ahayd xagga aqoonta. Waxa ku noolaa dad badan oo Yuhuud ah (waa halkii Kitaabka Cibraaniga ah loogu tarjumay Giriigga, Sabtuujantiga) waxaanay ahayd meeshii uu ku noolaa Philo, oo ahaa aqoon yahayn Yuhuudi ahi.

▣ **“Efesos yimid”** Falimaha Rasuulladu maaha taariikhayn faahfaahsan. Bawlosna wuu tegay oo keliya (aayadda 23).

▣ **“nin hadalyaqaan ah,”** Ereyadan luqada Koine Giriigga waxa loogala jeedi karaa hadal kar ama qof aqoon leh. Sabtuujantiga dhexdiisa *logios* waxa loo adeegsaday hadallada Ilaah. Abolloos waxa uu hadiyad ahaan u lahaa oo meelaha fagaaraha ah kaga cod karsanaa Bawlos (barbar dhig I Korintos. 1:17; 2:1; II Korintos. 10:10; iyo 11:6). Waxa uu ahaa wacdiye awood leh!

▣ **“oo Qorniinka garasho xoog leh u leh”** Ereyga “Qorniin” waxa uu tilmaamayaa Axdiga Hore (cf. I Tesaloniika. 2:13; II Timoteyos. 3:16; I Butros. 1:23-25; II Butros. 1:20-21), oo ay la socoto ka reebanaanta II Butros. 3:15-16, halkaasoo qoraallada Bawlos (isu ekaysiinta) lagu sifeeyay xaalad waxyi ah. Abolloos Axdigiisa Hore si fiican ayuu u yaqaanay.

Ereyga “xoog leh” waxa weeyi *dunatos*, waxaana loo adeegsaday awoodda Ciise ee ereyga iyo camalka sida ku xusan Luukos 24:19, iyo ta Muuse sida ku xusan Fal 7:22.

18:25 “Ninkaas hore baa loo baray” Waa fal uu soo horreeyo mafcuulku (Luukos 1:4). Waxa hore loogu tabo baray waxbarista Ciise, laakiinse heer kooban. Curtis Vaughan, *Acts*, p. 118, footnote #2, waxa uu diiwaan gelinayaa waxyaalaha laga yaabo Abolloos inuu aqoonta u lahaa isla markaasna wax ku wacdiyay.

1. Yooxanaa waxa uu ahaa kii Masiixa hordhaca u ahaa.
2. Waxa uu Masiixa ku tilmaamay Wanka Ilaah oo denbiyada dunida qaadi doona.
3. Ciisaha reer Naasereet wuxuu ahaa Masiixa.

Sidoo kale waxaan u malaynayaa in waxbaristiisu koobsanaysay towbad keenka waayo waxay ahayd wacdintii Yooxanaa iyo Ciise labadaba.

▣ **“jidka Rabbiga”** “jidka” waa magaca ugu horreeya oo loo adeegsaday kuwa Ciise raaca sid aku sagan Falimaha Rasuullada (cf. 9:2; 19:9,23; 22:4; 24:14,22; Yooxanaa 14:6). Waxa marar badan lagu dhex isticmaalay Axdiga Hore (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 5:32-33; 31:29; Sabuurka. 27:11; Ishacyaah. 35:8), halkaasoo ay ka hadlayso iimaan qaab nololeed leh. waxa aan lahubin haddii ay macnahaas ku leedahay halkan (cf. 18:26).

Abolloos sidoo kale wuxuu ogaa wax ku saabsan Ciise, laakiinse waxay ahayd oo keliya adeeggiisii ugu horreeyay iyo intii ka horraysay sarakicista uu injiilku ka hadlayo.

▣ **“oo isagoo ruuxa ku kulul”** Macnaha tooska ahi waxa weeyi “ka gubanaya ruuxa.” Weedhani waxay sheegaysaa Abolloos wixii uu sameeyay iyo wixii uu ka fahansanaa nolosha iyo waxbarista Ciise.

▣ **“isagoo garanaya baabtiiskii Yooxanaa oo keliya”** Weedhan ku saabsan Abolloos waxa laga yaabaa inay tahay qaabka uu Luukos u tilmaamayay xerta Yooxanaa 19:1-7. Waxa jirtay bidco badan oo qarnigii koobaad ka jirtay Falastiin iyadoo la xidhiidha waxbaristii iyo wacdintii Yooxanaa Baabtiisaha.

Yooxanaa wuxuu ahaa nebigii ugu danbeeyay Axdiga Hore ee hordhaca u ahaa imaatinka Masiixa (cf. Ishacyaah. 40:3; Matayos. 3:3), laakiinse muu ahayn kii u horreeyay ee injiilka wax ku wacdiya. Haddii Abolloos wacdintiisu ay aad ugu saabsanayd Yooxanaa, markaa waxay noqonaysaa inuu ka tegey muhiimadda Ciise. Yooxanaa iyo Ciise labaduba waxay ka hadleen “towbad keen,” “iimaan,” iyo “nolol cibaado leh.” labaduba

waxay Yuhuudda ugu yeedheen inay la yimaaddaan rumaysad iyo camal cusub (axdi rumaysadnimo ah iyo iimaan shakhsi ahaaneed oo lagu yeesho YHWH). Si kastaba ha ahaatee, fariinta Ciise waxay ku saabsanayd oo udub dhexaad u ahaa isaga (Yooxanaa 10 iyo 14), waxaana suurto gal ah in Abolloos ay middani ka maqanayd.

18:26 “oo wuxuu bilaabay inuu geesinimo kaga dhex hadlo sunagogga” Falkan waxa loo isticmaalay Bawlos oo Yuhuudda kula dhex hadlayay sunagogga sida ku xusan 13:46; 14:3; 19:8 iyo Festus hortiisa sida ku xusan 26:26. Abolloos waxa uu ahaa wacdiye saamayn iyo xoogba leh.

▣ **“sunagogga dhexdiisa”** fiiro u yeelo Bariskilla iyo Akula oo sidoo kale halkaas joogay . sioo kale tani waxay ahayd caadada Bawlos.

▣ **“Bariskilla iyo Akula”** Waxa iyada la sheegay ugu horrayn marar badan 18:18,26; Rooma. 16:3; II Timoteyos. 4:19. Tani waa arrin aan caadi ahayn, waxaana suuro gala inay ahayd shakhsiyad Roomaana oo sharaf leh. Sida ku sugan Fal 18:2, Akula waxa la sheegay inuu yahay Yuhuudi, laakiin Bariskilla lama sheegin. Waxa iyaga lagu qasbay inay Rooma ka tagaan wakhtigii Boqor Kalawdiyos uu amarka soo saaray sanadkii C.D. 49. Waxay la Korintos kula kulmeen oo saaxiib kula noqdeen Bawlos iyagoo una raacay Efesos. Saddexdoodubana waxay ahaayeen kuwo dakhli samaynasayay.

▣ **“ayay kaxaysteen”** Ereygan waxa loo isticmaalay marka la sheegayo qof oo la aqbaloo saaxiibtinimadiisa. Lama hubo sida iyo halka ay Bariskilla iyo Akula ay sidan ugu sameeyeen Abolloos. Waxa laga yaabaa inay isaga si gaara ula hadleen ama ay kaxaysteen. Fiiro u yeelo iyaga oon isaga ula hadlin si cid waliba u maqli karto.

▣ **“kolkaasay aad ugu sii caddeeyeen jidka Ilaah”** waxa uu ahaa qof wax la bari karo, tanina aadbay ugu yartahay dadka hadiyadda ama aqoonta leh! waxa uu ka jawaab celiyay Warbixintooda buuxda ee ku saabsan Ciise.

18:27 “oo markuu damcay inuu u sii dhaaf Akhaya” qoraal gacmeedka Giriigga ah ee D wuxuu ku darayaa “isaga oo la hadlaya Masiixiyiinta Korintos.” Waxa uu ahaa boqorka wacdiyohooda (qaab shabahaadeed Giriig ah).

▣ **“walaalihii dhiiro geliyeen, oo waxay xerta u qoreen”** Waraaqo iskula talin ah ayaa waxa lagu sheegay Rooma. 16:1; II Korintos. 3:1; iyo II Yooxanaa. Tani waxay ahayd sida ay kaniisaddii ugu horraysay isugu war gelin jirtay si looga digtoonaado macallimiinta beenta ah.

▣ **“aad buu u caawiyey iyagii, kuwaasoo nimco ku rumaystay”** Waxa jirta labo siyaabood oo loo fahmi karo weedhan.

1. inay sheegayso rumaystayaashii horeba ugu badbaaday nimcada (NASB, NKJV, NRSV, TEV)
2. in ay tilmaamayso naxariista Ilaah ku xoogeeyay Abolloos (NJB)

Falka caawiyay (kaalmeeyay), waa fal wakhti tegay ah oo wax tusinaya. Abollos waxa uu ahaa barako! Falka mafcuulku soo horreeyo ee “rumaystay” waa fal dhammays tiran, waxaanu tusinayaa inay horeba u ahaayeen rumaystayaal. Bawlos waxa uu ahaa xer ka dhige oo wacdiye ahaan ugamuu shaqaynayn Korintos.

18:28 Abolloos waxa uu Axdiga Hore u isticmaalay sidii ay sameeyeen Butros, Istefanos, iyo Bawlos. Axdiga Hore oo laga tusiyo in Ciise uu ahaa Masiixu, waxa uu ahaa tusaale kusoo noqnoqda wacdinta Yuhuudda ee ku sugan Falimaha Rasuullada (eeg Fiirada 17:3).

SU’AALO FALQAYN AH.

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay tahay sababta Birstilla badanaa loo hor sheegay Axdiga Cusub dhexdiisa?
2. Sidee Bawlos uu ku bartay Birstilla iyo Akula? Sabab?
3. Birstilla iyo Akula dib ma ugu laabteen Rooma weligood? Sidee ayaan ku ogaan karnaa?
4. Isbarbar dhig qaab wacdineedkii Bawlos iyo Abolloos.
5. Abolloos ma waxa uu ahaa Masiixi ka hor intii aan booqashada kula imanin Akula iyo Biriskilla?

FALIMAHA RASUULLADA 19

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos oo jooga Efesos	Bawlos oo jooga Efesos	Bawlos oo in badan ka adeegay Efesos	Bawlos oo Efesos dhex jooga	Xertii Yooxanaa ee joogay Efesos
19:1-7	19:1-10	19:1-7	19:1-2a 19:2b 19:3a 19:3b 19:4 19:5-7	19:1-7
19:8-10		19:8-10	19:8-10	Aasaaskii kaniisadda Efesos 19:8-10
Wiilashii Iskeba	Mucjisooyin lagu ammaanay Masiixa		Wiilashii Iskeba	Jinni saarayaashii Yuhuudda
19:11-20	19:11-20	19:11-20	19:11-14 19:15 19:16-20	19:11-12 19:13-17 19:18-19 19:20
Xasillooni darradii Efesos	Xasillooni darradii Efesos		Xasillooni darradii Efesos	Qorshayaashii Bawlos
19:21-27	19:21-41	19:21-22	19:21-22	19:21-22 Efesos: rabshaddii lacagtumaha
19:28-41		19:23-27 19:28-41	19:23-27 19:28-34 19:35-41	19:23-31 19:32-41

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 19:1-7

¹Haddaba waxaa dhacay. markii Abolloos Korintos joogay. in Bawlos oo soo dhex maray waddanka sare yimid Efesos, oo halkaas wuxuu kula kulmay kuwo xer ah. ²Markaasuu ku yidhi iyagii, Ruuxa Qoduuska ah ma hesheen markaad rumaysateen? Kolkaasay ku yidhaahdeen, Maya, maba aannu maqlin in Ruuxa Qoduuska ahi jiro iyo in kale. ³Markaasuu ku yidhi. Haddaba maxaa laydinku baabtiisay? Oo waxay ku yidhaahdeen. Baabtiiskii Yooxanaa. ⁴Bawlosna wuxuu ku yidhi, Yooxanaa wuxuu dadka ku baabtiisay baabtiiska toobadda, isagoo dadkii ku leh, Waa inaad rumaysataan kan iga daba iman doona, isagoo ula jeeda Ciise. ⁵Oo markay waxaas maqleen, waxaa iyagii lagu baabtiisay Rabbi Ciise magiciisa. ⁶Markii Bawlos gacmaha dul saarayna ayaa Ruuxa Qoduuska ahu ku soo degay iyagii; markaasay afaf kale ku hadleen oo ay wax sii sheegeen; ⁷nimankii oo dhanna waxay ahaayeen abbaaraha laba iyo toban.

19:1 “waddanka sare” Tani waxay tilmaamaysaa jidka xagga waddanka sare iyo kaniisadaha ku bilaabmay adeegii hore ee Bawlos ee Koonfurta Galatiya.

▣ **“Efesos”** Michael Magill, *NT TransLine*, p. 413, #25, ayaa waxa uu dhigayaa warbixin.

“Tani waxay ahayd caasimadda Aasiya, halkaasoo Bawlos laga mamnuucay inuu tago sida ku xusan 16:6. Waxa uu istaagay halkaas sida ku sugan 18:19-21, isagoo qorshaynaya inuu laabto. Imika in ka badan laba sano ayuu joogayaa halkan, 19:10.”

▣ **“xer ah”** Waxa ay tusinaysaa in ay ahaayeen kuwo rumaystay (aayadda 2, “markaad rumaysateen” eeg Mawduucyada Gaarka ah 3:16 iyo 6:5) Ciise Masiix kuna rumaystay Yooxanaa Baabtiisaha farriintiisii ama waxa suuro gala inay ku rumaysteen farriintii Abolloos.

Ruuxu waxa uu Bawlos jidkan sare ugu diray si uu u caawiyo “xertani” inay gaartaan oo si fiican u fahmaan xaqiiqada buuxda ee injiilka.

19:2 “Ruuxa Qoduuska ah ma hesheen markaad rumaysateen?” xaqiiqada loogu magacaabay “xer” (aayadda 1) iyo hadalka “markaad rumaysateen” waxay tusinaysaa inay ahaayeen rumaystayaal. Su’aashani waxay isku

xidhaysaa (1) aqbalitaanka shakhsi ahaaneed ee Ruuxa marka qofku rumaysto (fal tegay oo wax tusinaya iyo fal tegay oo mafcuulku soo horreeyo) iyo (2) falka diyaar garaynta Ruuxa oo la'aantiis aanay cidi rumaysad la imanayn (cf. Yooxanaa 6:44,65; Rooma. 8:9). Waxa jira heerar ay leedahay shaqada Ruuxu (cf. Fal 8:11, 15-17). Kitaabka Falimaha Rasuullada laftiisa ayaa mufasiriinta casriga ah uga digaya inaanay la yaabin “lagama maarmaanimada” iyo kala nidaamka badbaadada. Falimaha Rasuulladu waxa uu diiwaan gelinayaa wixii soo arooray, mana aha waxa iman doona wakhti kasta mid qoraya. Badbaadadu waa xidhiidh shakhsi ahaaneed oo koobsanaya qofka oo dhan, laakiin badanaa waa khibrad koraysa iyadoo xidhiidhkuna uu qoto dheeraanayo isla markaana fahanka qorniinka loo yeeshaa uu badanayo. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:40.

▣ **“Maya, maba aannu maqlin in Ruuxa Qoduuska ahi jiro iyo in kale.”** wacdinta Yooxanaa may soo saari karaynin saamayn ruuxi ah la'aanta Ruuxa (cf. Rooma. 8:6-11; I Korintos. 12:3; I Yooxanaa 4:2). Yooxanaa Ruuxa wuxuu ku sheegay wacdintiisa (cf. Matayos. 3:11; Markos 1:8; Luukos 3:16; Yooxanaa 1:32-33), laakiin waa in la xusuusto in fariintiisu ay ahayd diyaar garayn oonay ahayd dhammaystir (cf. Ishacyaah. 40:3; Matayos. 3:3). Yooxanaa wuxuu ahaa nebigii ugu danbeeyay Axdiga Hore iyo wacdiyaha iyo diyaar garaynta xilliga kala guurka ee imaanshaha Masiixa. Waxa uu dadka u tilmaamay Ciise (cf. Yooxanaa 1:19-42).

19:3 “Haddaba maxaa laydinku baabtiisay” iyagu waxay ahaayeen kuwo raacsan Yooxanaa Baabtiisaha. Dhinaca kalena waxay ahaayeen kuwo rumaysan iftiinka ay haysteen, laakiin waxay u baahnaayeen faahfaahin dheeraada oo ku saabsan nolosha, dhimashada, sarakicista, iyo kor aadista (injiilka) Ciise, sida Abolloos oo kale (cf.18:24-28).

19:3-4 “Baabtiiskii Yooxanaa” Baabtiiskii Yooxanaa wuxuu koobsanayay towbad keen iyo wax filasho (cf. Matayos. 3:11; Markos 1:15). Si kastaba ha ahaatee, waa in uu ku ladhnaado iimaan lagu yeesho Ciise. Taariikhda waxa aan ka ogaanaynaa in ay jireen kooxo bidcoolayaal ah oo jiray qarnigii koobaad, isla markaasna sheeganayay in ay yihiin xerta Yooxanaa Baabtiisaha (*Recognitions of Clement*, chapter 60). Qoritaanka waxyaalahanina waxa laga yaabaa in uu Luukos ku rabay inuu beeniyo saamaynta kooxahan. Adeegitaanka Yooxanaa waxa uu ahaa mid naftiisa ka baxsan oo tilmaamay fartana ku fiiqay Ciise (cf. Yooxanaa 1:19-42).

19:4 “rumaysataan kan iga daba iman doona” Eeg Mawduuca Gaarka ah: Rumays 3:16 iyo 6:5.

19:5 “waxaa iyagii lagu baabtiisay” Ka eeg Mawduuca Gaarka ah 2:38.

▣ **“Rabbi Ciise magiciisa”** Luukos waxa uu baabtiisa ku sheegayaa isagoo ku ahaaday “magaca Ciise” (cf. 2:38; 8:12,16; 10:48). Eeg Mawduuca Gaarka ah: Magaca Rabbiga 2:21. Matayos waxa uu baabtiiska ku sheegayaa inuu ku ahaaday “magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuska ah” (cf. Matayos. 28:19). Qaacidada baabtiisku maaha furaha badbaadada, laakiin waa qalbiga qofka oo baabtiisma. Qaacidada oo loo arko furuhu waxa weeyi iyada oo dhinac qaldan loo kaco. Baabtiisku maaha ansixinta saxsanaanta, laakiinse waa galitaanka towbadkeenka/iimaanka lagu yeesho Ciise. Eeg fiirada 2:38.

Inta aan ka ogsoonahay Abolloos oo sidoo kale yaqaanay baabtiiska Yooxanaa, dib looma baabtiisin! Ruuxu waxa uu ka muuqday awoodda waxbaristiisa iyo wacdintiisa.

19:6 “Markii Bawlos gacmaha dul saarayna ayaa Ruuxa Qoduuska ahu ku soo degay iyagii” Gacan saarista waxa badanaa lala xidhiidhiyay Ruuxa (cf. 8:16-17; 9:17), laakiin maaha hadiyo goor (cf. 10:44, eeg Mawduuca Gaarka ah 6:6). Kitaabku wuxuu rumaystaha Ruuxa ula xidhiidhinayaa saddex siyaabood oo kala duwan:

1. wakhtiga rumaysashada
2. wakhtiga baabtiiska
3. isagoo la socda gacan saarista.

Kala saaritaankani waa inuu inooga digo arrintan oo si qaldan loo fahmo. Falimaha Rasuullada ujeedada loo qoray maaha inuu dejiyo tusaale, laakiin waxa weeyi sheegitaanka dhaqdhaqaaqii Ruuxa.

Waa in aan qiro labo iyo tobankan xerta Yooxanaa ah oo ku hadlayay carabo kala duwani inay iga yaabisay aniga. Caadi ahaan Falimaha Rasuullada dhexdiisa carrabadu waxay caddayn ugu yihiin Yuhuudda rumaystayaasha ah in Ilaah

1. uu aqbalay koox cusub ama
2. ama uu jebiyay xuduudii juquraafi ahaaneed (eeg fiirada 2:4b)

Kooxdee cusub ayaa nimankani ay metalayaan? Waxay hore u ahaayeen xer (aayadda 1). Muxuu Luukos u doortay diiwaan gelinta dhacdadani? Waxa uu u doortay inuu ku lifaaqo Abolloos sida ku sugan cutubka 18. Tani kuma habboona tusaalaha tusinaya in mufasiriinta casriga ahi ay isku dayayaan inay saleeyaan ujeedo ama qaab fasiraadeed oo ah qoraalka Luukos isla markaasna aan ku haboonayn! Waxa laga yaabaa in dhacdadani ku hadlitaanka carabadu ay aad uula mid tahay kuwa ku sugan Korintos!

Waxa jira kala duwanaansho xiiso leh oo ku saabsan sida Axdiga Cusubi u sheegayo qaabka Ruuxu ugu yimaaddo qof kasta.

1. kusoo dul degay (*erchomai plus epi*), cf. Matayos. 3:16; Luukos 19:6 [just *epi*, 2:25]
2. lagu baabtiisay, cf. Matayos. 3:11; Markos 1:8; Luukos 3:16; 11:16; Yooxanaa 1:33; Fal 1:5
3. ku koryimid, cf. Matayos. 3:16; Markos 1:10; Luukos 3:22
4. kusoo degay (*eperchomai plus epi*), cf. Luukos 1:35; Fal 1:8
5. ka buuxsamay, cf. Luukos 1:15,41,67; Fal 2:4; 4:8,31; 9:17; 13:9,52
6. ku sababay (*ekcheō*), cf. Fal 2:17-18,33; 10:45; Tiitos 3:6
7. helay, cf. Fal 2:33,38; 8:15,17,19; 10:47; 19:2
8. la siiyay, Fal 5:32; 10:45; 15:8
9. kusoo degay (*epiptō*), cf. Fal 8:16; 10:44; 11:15

▣ **“oo ay wax sii sheegeen;”** Ereygani waxa uu xidhiidh la leeyahay dabecadda wax kusii baraarugista ee Axdiga Hore (cf. I Samuu’eel. 10:10-12; 19:23-24). Waxa laga yaabaa in macnaha tuducuna uu taageerayo fasiraaddan. Si kastaba ha noqotee, ereygan ku sugan I iyo II Korintos (cf. I Korintos. 11:4,5,9; 14:1,3,4,5,24,31,39) waxa uu tusinayaa ku dhiirrashada ku wacdinta injiilka. Waxa adag in waxsii sheegidda Axdiga Cusub la qeexo. Maadaama oo ka buuxsamidda Ruuxa badanaa lala xidhiidhiyay ku dhiirrashada ku wacdinta injiilka, waxa laga yaabaa in ujeedada looga socdaa ay middan tahay. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Waxsii sheegidda Axdiga Cusub 11:27.

19:7 “nimankii oo dhanna waxay ahaayeen abbaaraha laba iyo toban.” Labo iyo Tobanku waxa uu ka mid yahay tirooyin dhowra oo calaamad ahaan loogu dhex isticmaalay Kitaabka, laakiin halkan waxay ugu muuqataa taariikh ahaan. Eeg Mawduucyada Gaarka ah: 1:22 iyo 1:3.

NASB (UPDATED) TEXT: 19:8-10

⁸Haddaba sunagogga ayuu galay. oo meeshaas ayuu saddex bilood geesinimo kaga dhex hadlay, isagoo dadka la doodaya oo u soo jeedinaya waxyaalo ku saabsan boqortooyada Ilaah. ⁹laakiin qaarkood markay madax adkaadeen oo caasiyoobeen, iyagoo xumaan kaga hadlaya Jidka dadkii badnaa hortooda, ayuu iyagii ka tegey oo xertii ka soo soocay, oo maalin walba ayuu dad kula doodi jiray iskoolka Turannos. ¹⁰Taasuna laba sannadood ay socotay, si dadkii Aasiya degganaa, oo Yuhuud iyo Gariigba lahaa, ay u wada maqlen hadalka Rabbiga.

19:8 “sunagogga ayuu galay” Tani waxay ahayd caadadiisu iyo sida uu mar walba samayn jiray (cf. 9:20; 13:5,14; 14:1; 17:2, 10; 18:4,19,26).

▣ **“geesinimo kaga dhex hadlay”** Waa fal dhammays tiran wax tusmaynaya. Waxa ay ka mid ahayd arrintan natiijooyinka “ka buuxsanaanta Ruuxa” (cf. 4:13,29,31; 9:28,29; 14:3; 18:26). Bawlos middan aad ayuu uugu tukanaysaa sida ku xusan Efesos. 6:19.

▣ **“saddex bilood”** Sunagoggan ku yaallay Efesos waxa uu Bawlos u oggolaaday inuu ka sameeyo wacdin, waxbaris, iyo inuu iyaga la doodo Sabtiyo badan. Waxa halkan ka muuqanaya heer u furnaanta injiilka ah iyo awood Ilaah uu siiyay Bawlos.

▣ **“boqortooyada Ilaah.”** Waxay ahayd arrinta gundhigga u ahayd wacdintii Ciise. Waxa ay tilmaamaysaa xukunka Ilaah ee ku saabsan nolosha dadka iyo in maalin maalmaha ka mid ah dhulka oo dhan lagu keeni doono, sida samada ay ka tahay (Matayos 6:10). Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3.

19:9 “qaarkood markay madax adkaadeen oo caasiyoobeen” Dhamaan kuwii maqlay injiilku waxay lahaayeen ikhtiyaar (cf. 17:32, 34). Waxa middani ay ka tarjumaysaa masaalka ku saabsan beeralayda (cf. Matayos 13; Markos 4). Arrintani waxa weeyi qarsoodiga (cf. II Korintos. 4:4).

Ereyga “adkaadeen” (*sklēruco*) waa fal aan dhammaystirnayn oo mafcuulku soo horreeyo waxna tusinaya (caasiyoobeen waa fal aan dhammaystirnayn), kaasi oo tusinaya bilaabitaanka fal ama kusoo celcelinta fal socday wakhti tegay. Waa ereyga lagu dhex isticmaalay Rooma 9:18 si loo sheego Ilaah oo adkeeyay qalbiyada Israa’iil sidoo kalena waa fal kusoo noqnoqonaya Cibraaniyada 3 iyo 4 (cf. 3:8,13,15; 4:7) oo ka hadlaysay Israa’iil oo qalbigooda adkaaday wakhtigii cidlada. Ilaah ma adkeeyo qalbiyada dadka uu jecelyahay ee uu ka sameeyay ekaanshihiisa, laakiin waxa uu oggolaanayaa caasinimada aadanaha (cf. Rooma. 1:24,26,28) iyo saamaynta sharka shakhsi ahaaneed ku leeyahay dadkiisa uu abuuray (cf. Efesos. 2:1-3; 4:14; 6:10-18).

▣ **“iyagoo xumaan kaga hadlaya Jidka”** Injiilku waxa uu si aada uga duwanyahay gaarnimada iyo maanka ku salaysan camal samaynta, manay jirin wax kale oo loo samayn karo haddii dadka diinta Yuhuudda ay ay diidaan.

Luukos waxa uu sii wadaa sheegitaanka mucaaradnimada Yuhuudda ee ay kagasoo horjeedeen injiilka (cf. 13:46-48; 18:5-7; 19:8-10; 28:23-28).

▣ **“jidka”** Eeg sharraxaadaha 18:25 iyo 19:23.

▣ **“iskoolka Turannos”** Bezae, D, oo ka ahaaday qarnigii shanaad ayaa raacinaya in Bawlos uu wax bari jiray laga bilaabo 11:00 a.m. ilaa 4:00 p.m., oo ahayd marka dadku badanaa nasan jireen ee dhismuhu uu firaqada lahaa. Waxa laga yaabaa in middani ay ahayd dhaqan. Bawlos waxa uu shaqayn jiray saacadaha caadiga ah ee shaqada kaddibna wakhtiga soo hadhay wuxuu samayn jiray waxbaris (20:34).

Waxa jira aragtiyo la xidhiidha magacaabista Turannos.

1. Waxa uu ahaa suufi sida uu sheegay Suidas. Suidas wuxuu qoray qarnigii tobnaad, laakiin wuxuu adeegsaday ilo u noqonaya wakhtiyadii qadiimiga ahaa. Shaqadiisa suugaan ahaaneed waxay la mid tahay sida mawsuucada siyaasadda, suugaan ahaan, iyo shakhsiyadaha wacdiyayaasha ah.
2. Waxa uu ahaa Yuhuudi rabbaani ah (Meyer) oo iska lahaa dugsi khaas ah oo lagu barto sharciga Muuse, laakiinse ma jiro qoraal arrintan cadaynayaa.
3. Waxa uu ahaa dhisme asal ahaan gimaniisamku leeyihiin, laakiin mardanbe ayaa waxa uu noqday hool muxaadaro oo loo bixiyay Turannos.

Waxay ahayd Bawlos inuu ka tago sunagogga maadaama oo ay jireen kuwo badan oo rumaysad yeeshayna waxa uu kiraystay hool muxaadaro. Middani waxay u oggolaatay inuu xidhiidh ka helo dadkii ku noolaa Efesos.

19:10 “laba sannadood” sida ku sugan 20:31 Bawlos waxa uu kaga hadlayaa inta ay leekayd mudada uu joogay gobolka (saddex sanadood).

▣ **“dadkii Aasiya degganaa u wada maqleen”** Tani waa buunbuunin. Ciise waxa uu badanaa ku hadlay waxyaalo badan. Waxa ay ka qayb tahay dabiicadda duurxulka qoraallada bariga.

MAWDUUC GAAR AH: SUUGAANTA REER BARIGA

Sawirka wayn– iska hor imaadyada Kitaabiga ah

1. Fahankani waxa uu ahaa shakhsi ahaa arrin I kaalmaysay anigoo ah qof jecel kuna kalsoon Kitaabku inuu yahay Ereyga Ilaah. Isku dayitaanka Kitaabka oo si dhab ah loo qaato waxa muuqanaya qoraallo kala duwn oo tusinaya xaqiiqada la doortay iyadoon siyaabo kale loo marin. Qoraal waxyi ahi kama hor iman karo qoraal kale oo waxyi ah! Runtu waxay ku imanaysaa garshada dhammaanba Qorniinka (Qorniinka oo dhan, oon ahayn qaybi inay kelideed tahay waxyi, II Timoteyos. 3:16-17), oon ahayn

soo xigashada aayad qudha (daliil)!

2. Xaqiiqooyinka kitaabiga ah badankoodu (suugaanka bariga) waxa loo soo jeediyay sidii waxyaalo liddi isku ah (xusuusnow qorayaasha Axdiga Cusub, marka laga reebo Luukos, inay ahaayeen mufakiriin Cibraaniyiin ah, oo Giriig wax ku qoraya. Qoraallada Xikmadda iyo Qoraallada Gabayadu waxay xaqiiqada uga hadlayaan sidii layman is barbaryaalla. Is barbardhigidda laynka labaad uu ku xoojinayo ka hore waxa uu u shaqeeyaa si lamida iska hor imaadka. Is barbar dhiggan laynka saddexaad uu wax dheeraada ku kordhinayaana waxay u shaqaysaa sida qaybo isku mid ah). Dhinac marka laga eego labadu isku si ayay run u yihiin! Waxyaalahan iska hor imanayaana dhaqamadeenna aad bay ugu xanuun badan yihiin.
 - a. qadarka oo ay kasoo horjeeddo doonista xorta ah ee aadanuhu.
 - b. ammaanka rumaystaha oo ay kasoo horjeeddo dadaal samaynta
 - c. denbiga asalka ah oo uu kasoo horjeeddo denbiga fawdaynta ah
 - d. Ciise oo Ilaah ah oo ay kasoo horjeeddo Ciise oo aadane ahi
 - e. Ciise oo Aabbaha la mid ah oo ay kasoo horjeeddo Ciise oo Aabbaha adeege u ah
 - f. Kitaabka oo ah hadalka Ilaah oo ay kasoo horjeeddo dadka oo qoray
 - g. denbi la'aanta (wanaagsanaanta, cf. Rooma 6) oo ay kasoo horjeeddo denbi yaraantu
 - h. xaq ka dhigista hore iyo quduusnaanto oo ay kasoo horjeeddo quduusnaanta sii soconaysa.
 - i. xaq ku noqoshada rumaysadka (Rooma 4) oo ay kasoo horjeeddo xaq ka dhigista lagu ansixinayo camalka (cf. Yacquub 2:14-26)
 - j. xorriyadda Masiixiyadda (cf. Rooma. 14:1-23; I Korintos. 8:1-13; 10:23-33) oo ay kasoo horjeeddo masuuliyadda Masiixiyaddu (cf. Galatiya. 5:16-21; Efesos. 4:1)
 - k. Doonista Ilaah oo ay kasoo horjeeddo awooddiisu
 - l. Ilaah oon la garan karin oo ay kasoo horjeeddo isagoo lagu garan karo Qorniinka iyo Ciise
 - m. shabahaada badan ee Bawlos u adeegsaday badbaadada
 - (1) noqoshada carruurta Ilaah
 - (2) quduusnaanta
 - (3) xaq ka dhigista
 - (4) badbaadinta
 - (5) ammaanmitaanka
 - (6) qadarka
 - (7) dib ula heshiinta
 - n. Boqortooyada Ilaah oo joogta oo ay kasoo horjeeddo imashadeedu
 - o. towbad keenka oo ah hadiyad Ilaah bixiyo oo ay kasoo horjeeddo towabadda oo laga rabo aadanaha si ay u helaana badbaado (cf. Markos 1:15; Fal 20:21)
 - p. Axdiga Hore oo rasmi ah oo ay kasoo horjeeddo Axdiga Hore oo laga tegay (cf. Matayos. 3:17-19 vs. 5:21-48; Rooma 7 vs. Galatiya 3)
 - q. rumaystayaasha waa adeegayaal/addoomo ama carruurbelievers

NASB (UPDATED) TEXT: 19:11-20

¹¹Ilaahna wuxuu gacmaha Bawlos ku sameeyey cajaa'ibyo khaas ah, ¹²sidaas aawadeedna waxaa jidhkiisa kuwii bukay looga keenay marooyin yaryar ama macawiso, markaasaa cudurradii iyagii daayeen, jinniyadiina waa ka baxeen. ¹³laakiin kuwo Yuhuudda wareegi jirtay ka mid ah oo jinniyosaarayaal ah baa waxay ku talo jireen inay kuwii jinniyada qabay ka dul yidhaahdaan magaca Rabbi Ciise, iyadoo leh, Waxaan idinku dhaarinayaa Ciisaha Bawlos dadka ku wacdiyo. ¹⁴Waxaa jiray oo sidaas sameeyey toddoba wiil oo Iskeba dhalay, kaasoo ahaa wadaad sare oo Yuhuudi ah. ¹⁵Markaasaa jinnigii u jawaabay oo ku yidhi iyagii, Ciise ayaan garanayaa, Bawlosna waan aqaan, idinkuse yaad tihiin? ¹⁶Haddaba ninkii jinniga qabay baa ku booday iyagii, wuuna ka xoog badiyey kulligood, oo ka adkaaday, sidaas darteed ayay gurigaas ka carareen, iyadoo qaawan oo dhaawacan. ¹⁷Markaasaa waxaa taas wada ogaaday Yuhuuddii iyo Gariigtii oo dhan oo Efesos joogtay; baqdinna waa wada gashay dhammaantood, magaca Rabbi Ciisena waa la weyneeyey. ¹⁸Markaasaa qaar badan oo rumaystay yimaadeen iyadoo qiranaya oo caddaysanaya falimahooda. ¹⁹Kuwii sibir fali jirayna qaarkood intay kitaabbadoodii ururiyeen ayay dadka hortooda ku wada gubeen; wayna tiriyeen qiimadooda, oo waxay arkeen inay ahayd konton kun oo gogo' oo lacag ah. **20**Sidaasaa hadalkii Rabbigu xoog ugu batay oo u adkaaday.

19:11 Tani maaha markii ugu horraysay ee Ilaah uu isticmaalay mucjisooyin dabeecadda ka sarreeya si uu u tusiyo runta qofka isaga u hadlaya (cf. 3:1-10; 5:15; 8:6,13; 9:40-42; 13:11-12; 14:8-11). Waxyaalo badan oo been ah ay lagu dhex samayn jiray Efesos. Ilaahna maadaama oo naxariistiisa uu qani ku yahay waxa uu oggolaaday mucjisooyin awood leh oo ku salaysan Masiixiisa, si uu ugu muujiyo isagoo adeegsanaya Bawlos isla markaana ay arkaan dadka sharku ka buuxo. Naxariista Ilaah waa cajiib.

19:12 “marooyin yaryar” Waxa laga yaabaa in kuwani ay ahaayeen maryo lagu xidho madaxa marka la shaqaynaya.

▣ **“macawiso”** Tan waxa loogala jeedaa macawiso ama maryo shaqo sida maryaha makaaniga ama nijaaradu xidhaan oo kale. bogsiimahani waxay muujiyeen naxariista Ilaah, waxaanay ansixiyeen injiika oo ah kan uu u adeegayo Bawlos.

▣ **“jinniyadiina waa ka baxeen”** Halkan ruuxdan (cf. Luukos 10:17) waxa lagu magacaabay “ruux shar leh” (cf. Matayos. 12:45; Luukos 7:21; 8:2; 11:26; Fal 19:12,13,15,16). Laakiin Luukos sidoo kale waxa uu ku magacaabayaa “ruux wasakhaysan” (cf. 5:16; 8:7; eeg Mawduuca Gaarka ah 5:3 iyo 5:16). Sida ku sugan Fal 16:16 jinniga waxa lagu magacaabay “jinni wax sheega.” Weedhahan oo dhamina waxay u muuqdaan kuwo isku mid ah.

Bawlos badanaa jinniga wuxuu uga hadlayaa sida “xukunka iyo awoodda jinniga oo dhan” (Efesos 1:21), “awoodaha ka jira samooyinka” (Efesos 3:10), ama “kuwa madaxda ah iyo kuwo amarka leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo ruuxyada sharka ah oo samooyinka ku jira” (Efesos 6:12). Waxa middani ay sheegaysaa heerar ay maamulaan ruuxaha jinnigu. Laakiin sidee, waayo, halkee, iyo ciddu dhammaantood waa kuwo aan lagaranayn waayo Kitaabku kamuu hadlin xukunka rooxaaniga ah. Waxa uu kitaabku si cad uga hadlayaa awoodda Masiixa (iyo Rasuulladiisa) ka sarraysa Shaydaanka iyo boqortooyadiisa ah mugdiga iyo dhimashada. Magaca Ciise wuu ka sarreeya magac kasta! Isaga garashadiisuna waxay keentaa badbaado, nabad, wanaag iyo caafimaad.

MAWDUUC GAAR AH: MALAGYADA KU SUGAN QORAALLADA BAWLOS

Rabbaaniyuuntu waxay u malaynayaan in malaa’igtu ay ka hinaaseen jacaylka Ilaah iyo dareenka uu siinayo aadanaha leexday, sidaasi darteedna, cadawbay la ahaayeen. Macallimiintii Gonostiga ee beenta ahaa waxay sheegeen in badbaadadu lagu helayo siro qarsoon oo ku imanaya malaa’igta (Kolosay iyo Efesos), kaasi oo lagu gaadhayo ilaaha sare.

George Eldon Ladd ayaa si fiican ugu soo koobaya ereyada uu Bawlos u adeegsaday ma’aaigta kitaabkiisa *A Theology of the New Testament*:

“Bawlos kuma sheegayo oo keliya malaa’igta wanaagsan iyo kuwa xun, shaydaanka iyo jinka; balse wuxuu adeegsanaya ereyo badan oo kala saaraya ruuxa malaa’igaha. Ereyada uu adeegsanayaa waa sidan:

‘xukun’ [*arche*], I Korintos. 15:24; Efesos. 1:21; Kolosay. 2:10

‘xukuno’ [*archai*; RSV, “maamulayaal”], Efesos. 3:10; 6:12; Kolosay. 1:16; 2:15; Rooma. 8:38

‘awood’ [*exousia*], I Korintos. 15:24; Efesos. 1:21; Kolosay. 2:10

‘awoodo’ [*exousiai*; RSV, “awoodo”], Efesos. 1:21

‘awood’ [*dynamis*], I Korintos. 15:24; Efesos. 1:21

‘awoodo’ [*dynameis*], Rooma. 8:38

‘carshiyo’ [*thronoi*], Kolosay. 1:16

‘Maamule’ [*kyriotes*; RSV, “jinni”], Efesos. 1:21

‘Maamulayaal’ [*kyriotetes*], Kolosay. 1:16

‘maamulayaasha dunida mugdiga,’ Efesos. 6:12

‘ruuxyada sharka ah oo samooyinka ku jira,’ Efesos. 6:12

‘maamulka mugdiga,’ Kolosay. 1:13

‘Magac kasta oo la magacaabay,’ Efesos. 1:21

‘waxyaalaha samada ku jira iyo waxyaalaha dhulka jooga iyo waxyaalaha dhulka ka hooseeyaaba,’ Filiboy. 2:10” (p. 401).

19:13-16 “Yuhuudda jinniyosaarayaal ah” Yuhuudda jinnisaarayaasha ahi waxay ahaayeen caan (cf. Luukos 11:19). Macnaha halkan ka muuqdaa wuxuu tusinayaa in jinni saarista aan lagu samaynin qaacido sixir ah (magacyo), laakiinse uu yahay xidhiidh lala yeesho Ciise. Haddii waxa halkan aan kusugani uu ahaan lahaa waxa laga murugoodo waxay noqon lahayd wax lagu qoslo! Josephus ayaa waxa uu jinni saarista Yuhuudda ku sheegayaa *Antiq.* 8.2.5 ku ahaatay hal Eleazar, iyadoo la adeegsanayo salaadihii Sulaymaan.

19:13 “jinniyada” Middani waxay sheegaysaa jinniga. Axdiga Cusubi waxa uu in badan ka hadlayaa xaqiiqdan ruuxiga ah, laakiin kama hadlayo asalkeeda iyo faahfaahin ku saabsan sida ay u shaqeeyaan. Xiisaha, cabsida iyo adeegga la taaban karaa waxuu sababay aragtiyo badan. Ma jirto hadiyad khusaysa jinni saarista oo lagu sheegay Axdiga Cusub, laakiin baahida waxay tahay mid cad. Kitaabo kaa caawin kara arrintan ayaa waxay yihiin:

1. *Christian Counseling and the Occult* by Kouch
2. *Biblical Demonology* iyo *Demons in the World Today* by Unger
3. *Principalities and Powers* by Montgomery
4. *Christ and the Powers* by Hendrik Berkhof
5. *Three Crucial Questions About Spiritual Warfare* by Clinton E. Arnold

Eeg Mawduuca Gaarka ah: 5:16.

19:14 “Iskeba, kaasoo ahaa wadaad sare oo Yuhuudi ah” culimada casriga ahi magacan kama helin karaa qoraallo kale. Waxa dhibaato ah wadaad sare (*archiereus*) oo Yuhuudi ahi inuu joogo Efesos. Waxa jiray sunagog, laakiin macbadka Yuhuuddu wuxu ku yaallay oo keliya Yerusaaalem. Luukos ereygan waxa uu injiilka iyo Falimaha Rasuulladaba ku adeegsanayaa marar badan isagoo u isticmaalaya Wadaadka Sare iyo qoyskiisa ku sugan Yerusaaalem.

Qaar ayaa u malaynaysa in ninkani uu la xidhiidhay qoyska Wadaadka Sare, ama waxa suuro gala inuu madax ka ahaa mid kamida afar iyo labaatanka amar ee wadaaddada oo uu dejiyay Daa’uud (cf. I Taariikhdi. 24:7-19).

Haddii ninkan iyo wiilashiisu ay ahaayeen wadaaddo, waxa la yaableh iyaga oon adeegsanin YHWH magaciisa awoodda badan si loo maamulo jinniga iyaga oon adeegsanaynin sixir ama wax la mid ah.

19:15 “Ciise ayaan garanayaa, Bawlosna waan aqaan” Falka hore waa *ginōskō*, ka labaadna waa *epistamai*. Dhinac marka laga eegana waa isku mid labadu. Labadan falba waxa marar badan lagu isticmaalay Falimaha Rasuullada, laakiin macnaha halkan ay ugu jirto waxa jira farqi ay ku samaynaso oo u dhexeeya jinnigani aqoonta uu u leeyahay Ciise inuu yahay Masiixa iyo Bawlos oo ah kan isaga u hadlayay.

19:17 Luukos waxa uu arrintan u qorayaa si uu u tusiyo sida Ruuxu u waynaynayay (fal aan dhammays tirnayn oo mafcuulku soo horreeyo) Ciise (cf. Yooxanaa 14:25; 16:13-14).

19:18 “qaar badan oo rumaystay” Waa fal dhammays tiran oo mafcuulku soo horreeyo. Su’aashu waxay tahay ma waxay ahaayeen rumaystayaal mise weedhu waxay tilmaamaysaa rumaysashadooda cusub ee ay ku ay rumaysteen injiilka? Waxa sidoo kale suurto gal ah in rumaystayaasha cusub ee ku sugan injiilku ay ahaayeen kuwo ilaa hadday ay saamayn ku lahayd dabecadahoodii hore. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Falalka Giriigga ee loo adeegsaday Badbaadada 2:40.

Kuwii haystay dhaqamada hore waxa laga yaabaa inay ku qanceen waxa ku dhacay jinni saarayashaasii Yuhuudda sida ku xusan aayadaha 13-16. Farriinta dhacdadani oo tusinaysay awoodda uu leeyahay magaca Ciise aad ayay u faaftay (aayadda 17). Dadkani waxay noqon dooneen kuwo dareema awoodda uu leeyahay “magacani.”

▣ **“yimaadeen”** Waa fal aan dhammaystirnayn oo wax tusinaya.

▣ **“iyagoo qiranaya oo caddaysanaya falimahooda”** Dunidii hore ee Bariga dhexe waxay lahaayeen caadooyin sixir ah. Waxa si guud loo aaminsanaa haddii qof qaacidadiisa sixirka lasoo ban dhigo unuu noqonayo wax aan waxba samayn karin. Qaabkanina waxa uu ahaa sida ay u samayn jirayn falimohoodii hore. Waxa jira nooc ka mida qoraallada sixirka oo caan ka ahaa dunidii hore laguna magacaabi jiray “qoraallada Ephesian ka”! dhacdadani waxay tusinaysaa injiilka oo ka awood wayn sixirka (aayadda 20).

MAWDUUC GAAR AH: QIRASHO

- A. Waxa jira laba qaab oo la mid ah asalkii Giriiga oo loo adeegsaday qirasho , *homolegeo* iyo *exomologe*. Ereyga qaabka isku dhiska ee Yooxaana u adeegsaday *homo*, waxay la mid tahay *legio*, hadlid; iyo *hore*, bannaanka ka ah. Macnaha aasaasiga ahi ee ay sheegayaan waa wax isku mid ah, isku raacid, hore oo lagu daray bayaankii dadwaynaha.
- B. Turjunka Ingriisiga ee ereygan koox waa
1. Ammaan
 2. Isku waafaqid
 3. Bayaamin (cf. Matayos. 7:23)
 4. Qirasho
 5. Danbi qirasho (cf. Cibraaniyada. 4:14; 10:23)
- C. Eray kooxeedkani waxay leeyiin laba hab adeegsi u muuqda in ay iska soo horjeedaan
1. In Ilaah la ammaano
 2. In danbi la qirto
- Tani waxaa laga yaabaa in ay ku kortay fahanka binuaadanka ee macnaha qudduusnimada Ilaah iyo dambiilenimadooda. In la qiro midood run waxay qiraysaa labadoodaba.
- D. Axdiga Cusub Adeegsiga eray kooxeedkani waa
1. la ballanqaaday (Matayos 14:7; Falimaha Rasuullada 7:17)
 2. Isku waa faqid ama isku raacid arrin (cf. Yooxanaa 1:20; Luukos 22:6; Falimaha Rasuullada 24:14; Cibraaniyada 11:13)
 3. In la ammaano (cf, Matayos 11:25; Luukos 10:21; Rooma 14:11; 15:9; Cibraaniyada. 13:15)
 4. Ku raacid
 - a. Qof (cf. Matayos 10:32; Lukos 12:8; Yooxaana 9:22; 12:42; Rooma 10:9; Filiboy 2:11; I Yooxaana 2:23; Muujintii 3:5)
 - b. Run (cf. Falimaha Rasuullada 23:8 II Korintos 11:13; I Yooxanaa 4:2)
 5. Samaynta bayaan dad wayne oo (dareen sharci ahaan ku koray ansaxin diimeed, cf. Falimaha Rasuullada 24:14, I Timoteyos 6:13)
 - a. Danbi qirasho laan (I Timoteyos 6:12; Cibraaniyada 10:23)
 - b. Tiyo danbi la qirtay (cf. Matayos 3:6; Faliimaha Rasuullada 19:18; Cibraaniyada 4:14; Yacquub 5:16; I Yooxanaa 1:9)

19:19 “sixir” Ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 8:9.

Kitaabada” (*biblous*) waxa loogala jeeda karaa kitaabo badan ama qoraallo lagu qoro axdiyada ama habaarka. Waxa loo xidhan jiray sidii qardhaas oo kale. Qiimaha wayni wuxuu tusinayaa (1) sida dadkani u shaki sanaayeen iyo (2) sida injiilku uu iyaga u xoreeyay!

▣ **“ayay dadka hortooda ku wada gubeen”** Waxay ahaayeen kitaabo qaali ah oo aad loo raadin jiray. Gubitaankooduna waxa uu tusinayay in rumaystayaashan cusubi ay towbad keeneen oo rumaysteen Masiixa, isla markaana aanay rumaysneen “awoodaha” kale!

19:20 Farriinta injiilka waa la tilmaamay (i.e., hadalka Rabbiga) waana lasoo koobay. Luukos soo koobitaankiisu waxa uu inaga caawinayaa inaan Falimaha Rasuullada u qaybino lix qaybood (cf. 6:7; 9:31; 12:24; 16:5; 19:20; 28:31).

NASB (UPDATED) TEXT: 19:21-22

²¹Haddaba markii waxyaalahaasu dhammaadeen ayaa Bawlos ruuxiisa kula talo jiray inuu Yerusaaalem tago markuu Makedoniya iyo Akhaya sii dhex maray dabadeed, isagoo leh, Markaan meeshaas tago dabadeed, waa inaan Roomana arko. ²²Markaasuu wuxuu Makedoniya u diray laba ka mid ah kuwii isaga u adeegi jiray oo ahaa Timoteyos iyo Erastos, isaga qudhiisuse wuxuu ku hadhay Aasiya intii muddo ah.

19:21

NASB

“ruuxiisa kula talo jiray”

NKJV

“ruuxiisa kula talo jiray”

NRSV

“Bawlos wuxuu kula jiray Ruuxa”

TEV, NJB

“Bawlos uu maankiisa ku hayay”

TEV (sharaxa)

“Bawlos oo Ruuxu hagayo, wuxuu go'aansaday”

Halkan waxa isku dhex jira awoodda Ilaah iyo aadanaha doonistooda xorta ah. Waxa aan la hubin haddii adeegsi ereyga “ruux” uu tilmaamayo:

1. Ruuxa Quduuska ah ama
2. ruuxa dadka (cf. 7:59; 17:16; 18:25; Rooma. 1:9; 8:16; I Korintos. 2:11; 5:4; 16:18; II Korintos. 2:11; 7:13; 12:18; Galatiya. 6:18; Filiboy. 4:23).

Haddii uu yahay Ruuxa Quduuska ah, kani waa tusaale kale oo tusinaya hoggaaminta ilaahiga ah ee la xidhiidha ka jawaab celinta habboona ee dadka.

Luukos badanaa faallo kooban ayuu samaynayaa isagoo baraya si uu u tisiyo dhacdooyinka danbe. Waxa suurto gal ah in Luukos uu ogaa go'aanka Bawlos ee ah inuu tago Yerusaaalem iyadoo Ilaah uu hoggaaminayo (i.e., *die*, aayadda. 21; eeg sharraxa1:16), iyadoon ahayn sababtu waxyaalihii kaga yimid Demetriyas iyo lacagtumaha joogay Efesos (aayadaha 23-41).

☐ **“waa inaan Roomana arko”** Bawlos wuxuu u baahday (*dei*) inuu booqdo Rooma (cf. 9:15; Rooma. 1:10) isagoo ku sii jeeda Isbaniya (cf. Rooma. 15:24, 28). Wuxuu rabay inay isaga ogaadaan oo taageeraan shaqadiisa iyo adeeggiisa. Sidoo kale wuxuu rabay inuu xaaladdooda barakadiisa ugu daro.

19:22 “Erastos” Waxa jira nin magacan leh oo lagu sheegay Rooma 16:23. Waxa lagu magacaabay dhaqaale hayaha magaalada Korintos. Magacani waxa uu markalena kusoo aroorayaa II Timoteyos 4:20. Waxa laga yaabaa in ay sheegayso isla ninkan, laakiin lama hubo.

☐ **“isaga qudhiisuse wuxuu ku hadhay Aasiya intii muddo ah”** Injiilku wuu faafay isaga oo saamaynaya isla markaasna ay Masiixiyiin noqonayaan gobolladu (cf. I Korintos. 16:9).

NASB (UPDATED) TEXT: 19:23-27

²³Haddaba waxaa wakhtigaas kacday rabshad an yarayn oo ku saabsan Jidka. ²⁴Maxaa yeelay, ninkoo Deemeetriyos la odhan jiray oo lacagtume ahaa, oo macbudyo yaryar oo Di'ana lacag ka samayn jiray, wuxuu sancaawiyadii u keeni jiray faa'iido aan yarayn; ²⁵kuwaasoo uu isla soo ururiyey raggii la shuqul ahaa isagoo ku leh, Niman yahow, waad og tihiin inaynu shuqulkan ka helno hodantinimadeenna. ²⁶Waxaad arkaysaan oo aad maqlaysaan in Bawloskanu sasabay oo jeediyeed dad badan, oo aan kuwii Efesos oo keliya ahayn, laakiin kuwii joogay Aasiya badideed, isagoo leh, Ilaahyo gacmo lagu sameeyo, ilaahyo ma aha. ²⁷Khatar uma aha shuqulkeenna oo keliya in la quudhsado, laakiin waxay khatar u tahay oo kale in macbudka ilaahadda weyn oo Di'ana la fududaysto, weynaanteedana laga baabi'yo, taasoo Aasiya oo dhan iyo duniduba ay wada caabudaan.

19:23 “Jidka” Waxa uu ahaa qaabkii ugu horreeyay ee loo sifayn jiray Masiixiyadda. Waxay ka hadlaysaa fikirka Axdiga Hore (ex. Sabuurka. 1:1,6; 5:8; 25:4,8,9,12; 27:11; 37:5,7,23,34; 119:101, 105) ee qaab nololeedka iimaanka (cf. Fal 9:2; 19:9,23; 22:4; 24:14,22; waxa kaloo suuro gal ah 18:25-26).

19:24 “lacagtume ahaa” Waxa weeyi sawirada lacata (1) ee Macbadkii Artemis ama (2) ama muuqaaladii u eeka naagaha naasaha qaaqaawan. Cilmiga taariikhihii hore ayaa helay muuqaalo badan oo lacag ah oo ay leeyihiin ilaahyadani, laakiin kuwa macbadka waxba lagama helin. Waxay ahayd mid ka mida todobada mucjiso ee dunida wakhtigaas. Eeg sharraxa 18:19, #4.

▣ **“macbudo yaryar”** macbadyada Efesos lalama sheegin Di’anadii Roomaanka. Ilaahadahani waxay u dhowaayeen Cybele, hooyada Ilaahadda ah. dhaqamada diimahani waxay wax la wadaagayeen dhaqamadii Kancaan (see M. R. Vincent, *Word Studies*, vol. 1, p. 271).

▣ **“faa’iido aan yarayn”** silcintan waxa u sal ah dhaqaale (cf. aayadaha. 25,27). Eeg sharraxa buuxa ee hadallada sida kasta ah uu Luukos u sheegayo (i.e., *litotes*) 12:18.

▣ **“sancaawiyadii”** Ereygan Giriigga ah waxa laga helayaa erayga Ingiriisida ah ee “farsmo yaqaan.” Dunidii hore ee bariga dhexe sancaawiyada ama farsama yaqaanku waxay ahaayeen kuwo caana oo awood leh. Bawlosna waxa uu ka mid ahaa iyaga isagoo dakhli ku samayn san jiray.

19:26-27 Tani waxay ina siinaysaa fahanka guushii uu Bawlos adeeggiisa kasoo hoyiyay Aasiya.

▣ **“ilaahyo gacmo lagu sameeyo, ilaahyo ma aha”** Tani waxay ka tarjumaysaa fikirka Axdiga Hore ee ku waajahan sanam caabudista (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 4:28; Sabuurka. 115:4-8; 135:15-18; Ishacyaah. 44:9-17; Yeremyaah. 10:3-11).

19:27 Waxa jira qoraallo badan oo ku sugan suugaanta Giriigga ee qanigii koobaad isla markaana wax ka sheegaya macbadyadii yaryaraa ee Efesos. Waxa intaas dheeraa sagaal iyo soddon magaalo oo kala duwan isla markaasna ahaa bariga dhexe oo caabudi jiray hooyadan ilaahadda ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 19:28-41

²⁸Oo markay taas maqleen, aad bay u cadhoodeen, wayna dhawaaqeen iyagoo leh, Waxaa weyn Di'anada reer Efesos. ²⁹Magaaladii oo dhammuna waa wada qasnayd; waxayna qabsadeen Gayos iyo Aristarkhos oo ahaa niman reer Makedoniya oo la socdaali jiray Bawlos, markaasay iyagoo isku wada qalbi ah te'atradii ku yaaceen. ³⁰Kolkii Bawlos damcay inuu dadkii dhex galo, xertii uma ay oggolaan isagii. ³¹Haddaba qaar ka mid ah madaxda Aasiya oo saaxiibbo u ahaa isagii ayaa u soo cid diray, oo waxay ka baryeen inuusan isku biimayn te'atradii. ³²Haddaba qaar wax bay ku qayliyeen, qaar kalena wax kalay ku qayliyeen, maxaa yeelay, ururkii waa qasnaa, badidooduna ma ay garanayn waxay isugu yimaadeen. ³³Markaasay Aleksanderos ka soo saareen dadkii badnaa isagoo ay Yuhuuddii hore u soo tuurayaan. Markaasaa Aleksanderos gacan taagay, oo wuxuu damci lahaa inuu af isku daafaco dadka hortiisa. ³⁴laakiin kolkay garteen inuu Yuhuudi yahay ayay dhammaan intii laba saacadood ah isku cod ku qayliyeen iyagoo leh. Waxaa weyn Di'anada reer Efesos. ³⁵Markuu karraanigii magaaladu aamusiiyey dadkii badnaa, ayuu ku yidhi. Nimankiinan reer Efesosow, ninkee baan oqoon in magaalada Efesos ay tahay ta ilaalisa macbudka Di'anada weyn iyo sanamkii Yubiter ka soo dhacay? ³⁶Waxyaalahaasu waa wax aan la dafiri karin, sidaas daraaddeed waxaa idinku waajib ah inaad xasilloonaataan oo aydnaan samayn wax qamaam ah. ³⁷Waayo, waxaad halkan keenteen nimankan iyagoo aan ahayn kuwo macbudo dhaca ama kuwo caaya ilaahaddenna ³⁸Sidaas daraaddeed haddii Deemetriyos iyo kuwa la shuqul ah ay nin wax ku haystaan, maxkamadahu waa furan yihiin, xaakinnona waa jiraan; haddaba ha isdacweeyaan. ³⁹laakiin haddii aad doonaysaan wax ku saabsan axwaal kale, waxaa lagu gar gooyn doonaa ururkii sharciga. ⁴⁰Haddaba waxaa khatar inoo ah in laynagu ashtakeeyo rabshaddii maanta aawadeed, iyadoo aan sababu u jirin; taasoo aynaan kari doonin inaynu wax ka sheegno buuqan. ⁴¹Oo goortuu waxyaalahaas ku hadlay dabadeed ayuu ururkii kala diray.

19:28 Aayaddani waxay tusinaysaa sida dunidii hore ay isugu dhodhowaayeen xagga dhaqanka iyo diinta. Dad badan ayaa nolol maalmeedkooda waxay ka samayn jireen macbadyada dadka jaahilka ahi wax ku caabudaan.

▣ **“Waxaa weyn Di'anada reer Efesos”** ilaahaddan waxa loogu yeedhi jiray “ta Wayn.” Waxa laga yaabaa inay ahayd hal ku dhigga caabudaadda macbadka.

19:29 **“te'atradii ku yaaceen.”** Hadhaaga ti'ataradan Roomaanku ilaa maanta wuu taagan yahay. Waxa uu qaadayay inta u dhaxaysa 25 iyo 56 kun oo qof (qiyaasuhu way kala duwanyihiin).

▣ **“isku wada qalbi ah”** Falimaha Rasuulladu badanaa wuu isticmaalayaa weedhan “isku qalbi” si uu u tusiyo midnimada iyo isweheshiga ka dhexeeya rumaystayaasha (cf. 1:14; 2:1,46; 4:24; 5:12; 8:6; 15:25), laakiin sidoo kale waxa iyana loo adeegsanayaa sida loogu midoobin karo sharka (cf. 7:57; 12:20; 18:12). Midnimada lafteedu maaha ujeedada. Laakiinse ujeedada midnimada ayaa muhiim ah!

▣ **“Gayos”** Waxa uu ahaa reer Derbe (cf. 20:4). Waxa uu ahaa magac caan ah, sidoo kalena qeexitaankiisu wuu adagyahay (cf. I Korintos. 1:14; III Yooxanaa 3).

▣ **“Aristarkhos”** Waxa uu ahaa reer Tesaloniika (cf. 20:4; 27:2; Col. 4:10-11; Filiboy. 2:4).

19:30 **“xertii uma ay oggolaan isagii”** Bawlos waxa uu ahaa nin doonis xooggan leh! Si kastaba ha noqotee, waxa uu rumaystayaasha kale u oggolaaday inay saamayn ku yeeshaan kuwo ka mida go'amada (cf. aayadda. 31).

19:31 **“qaar ka mid ah madaxda Aasiya”** Weedhan waxa loogala jeeda “madaxda lagasoo doortay dadka,” laakiin macnoyaal dhowra ayaa loo isticmaalay. Waa erey kale oo Luukos uu u adeegsaday madaxda siyaasadda. Iyagu sidoo kale waxa ay noqdeen rumaystayaal, ama ugu yaraan saaxiibada Bawlos. Markale ayaa Luukos waxa uu muujinayaa in Masiixiyaddu aanay khatar ku ahayn madaxda dawladda hoose. Aayadaha ay middani ka midka tahayna waxa weeyi aayadaha ku sababay in kuwo ka mida mufasiriintu ay sheegaan, in Falimaha Rasuullada loo qoray in la akhriyo markii Bawlos lagu xidhay Rooma. Marar badan ayaa kaniisadda ay is khilaafeen Yuhuudda, laakiin ismay khilaafin dawladda!

19:32 **“ururkii”** Waxa uu la mid yahay ereyga Giriigga ah (*ekklesia*) ee loo isticmaalay kaniisadda. Fal 19:32,39, iyo 41 waxa ay ku sheegaysaa ururka dadkii tuulada.

Kaniisaddii hore waxa ay ereygan u doordeen waayo Sabtuujantiga ayaa loogu adeegsaday “ururka Israa'iil.” Eeg Mawduuca Gaarka ah: Kaniisad (*ekklesia*) 5:11.

▣ **“badidooduna ma ay garanayn waxay isugu yimaadeen.”** Waxa uu ahaa muuqaalka urur laga yaabay.

19:33 **“Aleksanderos”** Dadkii Yuhuuddu waxay dooneen in la fahmo inay ahaayeen koox gaar ah oo ka duwan adeegayaashan Masiixiyiinta ah, laakiinse way ku guul darraysteen. Haddii ninkani uu yahay ka lagu sheegay II Timoteyos. 4:14 iyo inkale lama hubo, laakiin I Timoteyos. 1:20 ayaa shaki gelinaya.

▣ **“gacan taagay”** Dhaqan ahaan waxa loo samayn jiray in dadka lagu aamusiiyo si qof uu u hadlo (cf. 12:17; 13:16; 19:33; 21:40).

▣ **“isku daafaco”** Ereyga Ingiriisida ah ee “apology” ayaa waxa uu ka imanayaa ereygan Giriiggiisa, isagoo lagu sheegay is difaacid sharci ah. Luukos falkan marar badan ayuu isticmaalay (cf. Luukos 12:11; 21:14; Fal 19:32; 24:10; 25:8; 26:1,2,24) Magacunu wuxuu ku sugan yahay Fal 22:1 iyo 25:16.

19:34 Tani waxay tusinaysaa mid ahaan (1) kuwii dunidii Giriigga iyo Roomaanka kagasoo horjeeday sematiga ama (2) dadkani cadhaday ka qabeen Bawlos adeeggiisa.

19:35 “karraanigii magaaladu” Kani waxa uu ahaa ka masuulka ka ah arrimaha dadka, waxaanu xidhiidh la lahaa xukuumadda Roomaanka ee magaaloyinkan lahaa macbadyada caanka ah. Ereyga *grammateus* waxa badanaa Falimaha Rasuullada dhexdiisa loogu isticmaalay culimada Yuhuudda (cf. 4:5; 6:12; 23:9). Sabtuujantiga dhexdiisa waxa loo adeegsaday hoggaamiyayaashii Masaarida ee wax u gudbin jiray taliyayaasha sare (cf. Baxniintii. 5:6) iyo xafiis hayayaasha Yuhuudda (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 20:5).

▣ **“in magaalada Efesos ay tahay ta ilaalisa macbudka”** Ereyga ilaaliye macnaha tooska ah waa “nadiifiyaha macbadka” (*neokos*, ilaalada macbadka). Kani waxa uu noqday magac sharfeed, inkasta oo ugu horrayntii lagu tilmaami jiray dadka ugu hooseeya ee ah addoomada macbadka.

▣ **“iyo sanamkii Yubiter ka soo dhacay”** waxa uu ahaa sanam leh muuqaalka naag leh naaso badan. Waxa uu ahaa sanamka ugu wanaagsan dhaqanka dadkan. Ereyga “yubiter” macnahiisa waxa loogala jeedaa “kii ka yimid Zeus (*dios*).”

19:37 Sabata kacdoonku ma laha sal run ah, sidaasi darteedna waxa masuulyaddeedu saarnayd maamulka anshaxa ee Roomaanka (cf. aayadda. 40).

19:38-39 “maxkamadahu waa furan yihiin” Ha la yimaadaan waxyaalaha ay ku dacwoonayaan. Labadan aayadood sidoo kale waxay wataan jumlad shuruudeedyo heerka koobaad ah.

19:38 “xaakinnona” Waxa jiray labo nooc oo ahaa gobolada Roomaanka, kuwii uu maamuli jiray Boqorku, iyo kuwii ay maamuli jireen Gudigu (Augustus, *Acts of Settlement*, 27 C.H.). Gobollada Roomaanka waxa lagu maamuli jiray

1. gobolo ay maamulaan gudi iyo xaakino
2. gobolo boqortooyo oo ay maamulaan taliyayaal
3. gobollada kalee dhibaataada yar waxa maamuli jiray maamul hoosaad.
4. magaaloyinka xorta ah waxa maamuli jiray hoggaamiyayaal kaso jeeda goobtaas, laakiinse hoos taga Roomaanka.
5. gobolada sida Falastiin waxa maamuli jiray hoggaamiyayaal maxali ah, laakiin waxay lahaayeen xad kooban.

Efesos waxa ay ahayd gobol uu maamulo gudi waxaanay lahaayeen “xaakin.” Xaakinnada saddex jeer ayaa la sheegay:

1. Sergius Paulus, Cyprus, Fal 13:7-8,12
2. Annaeus Gallio, Achaia, Fal 18:12
3. magac gaar ahi ma jiro, laakiin sifo, Efesos, Fal 19:38.

19:39-41 “urur” Waa ereyga *ekklesia*, oo gobollada Giriigga loogu isticmaalay urur tuulo. Waxa loo adeegsaday isu imaatinka kaniisadda waayo Sabtuujantiga dhexdiisa waxa looga tarjumay ereyga Cibraaniga ah ee “urur” (*Qahal*).

SU’AALO FALQAYNEED.

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Miyiaan aayadaha 2-6 u arki karnaa daliil loo adeegsado

- a. rumaystayaasha qaarkood in dib loo baabtiiso
- b. gacan saarista si loo helo barakada ku hadalka carrabada?
2. Qeex waxsii sheegidda (aayadda. 6).
3. Muxuu Falimaha Rasuulladu u qorayaa Bawlos oo la kulmay Abolloos iyo labo iyo tobankii ahaa xerta Yooxanaa Baabtiisaha?
4. Aayadaha 11-12 ma yihiin kuwo ku fulaya kaniisadda wakhti kasta iyo dhaqan kasta? Maxaanay u ahayn?
5. Maxaa jinni saarista loogu dari waayay hadiyadaha ruuxiga ah?
6. Maxaa rumaystayaasha loo siin waayan warbixin dheeraada oo kitaabi ah kuna saabsan mawduucan?
7. Maxay ahayd ujeedada dhacdooyinkan mucjisooyinku ku ladhnaayeen? (cf. aayadda. 17)

FALIMAHA RASUULLADA 20

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
U Socdaalkii Bawlos ee Makedoniya	Safarradii Giriigga dhexdiisa	Booqashadii ugu dambaysay ee Giriigga	U boqoolitaankii Makedoniya iyo Akiya	Bawlos wuxu ka tegay Efesos
20:1-6	20:1-6	20:1-6	20:1-6	20:1-6
Booqashadii salaanta ahayd ee Bawlos ku tegay Taroo'as	Ka adeegitaankii Taroo'as	Bawlos oo ku laabtay Falastiin (20:7-21:14)	Bawlos oo booqday Taroo'as	Taroo'as: Bawlos wuxu soo nooleeyay nin dhintay
20:7-12	20:7-12	20:7-12	20:7-12	20:7-12
Socdaal badeedkii ka baxay Taroo'as ilaa Mituleenee	Taroo'as ilaa Mituleenee		Taroo'as ilaa Mituleenee	Taroo'as ilaa Mituleenee
20:13-16	20:13-16	20:13-16	20:13-16	20:13-16
Bawlos wuxuu la hadlay odayaashii reer Efesos	Odayaashii reer Efesos waa la guubaabiyay		Bawlos oo macasalaameeyay odayaashii reer Efesos	Macasalaamaynta odayaashii reer Efesos
20:17-24	20:17-38	20:17-18a 20:18b-24	20:17-24	20:17-18a 20:18b-21 20:22-24
20:25-35		20:25-35 20:36-38	20:25-31 20:32-35	20:25-27 20:28 20:29-32 20:33-35
20:36-38			20:36-38	20:36-38

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-6

- A. Tani aad bay ku koobantahay, sidaas darteedna waxa jira xoogaa jaha wareer ku saabsan adeegii Bawlos ka waday Makedoniya iyo Giriig socdaalkii saddexaad.
- B. Sida ugu wanaagsan ee lagu garan karo adeegii Bawlos uu ka wadan dhulkan waxa weeyi iyadoo lala kaashado warqadihiisa, gaar ahaan I iyo II Korintos.
- C. Luukos wuxuu isku dayayaa inuu sheego faahfaahinta dhaqdhaqaaqii Bawlos isga oo adeegsanaya wakhtiga ioy magacyada goobaha, laakiinse waxay keenaysaa xoogaa jaho wareer ah.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 20:1-6

¹Markii rabshaddii dhammaatay dabadeed Bawlos ayaa xertii u cid diray oo dhiiro geliyey, markaasuu nabad geliyey oo baxay inuu Makedoniya tago. ²Oo kolkuu meelahaas sii dhex maray oo uu hadal badan ku dhiiro geliyey iyagii, ayuu wuxuu yimid dalka Gariigta. ³Oo markuu saddex bilood meeshaas joogay, oo Yuhuuddu sirqool u dhigtay, markuu u dhowaa inuu Suuriya u dhoofa, ayuu wuxuu goostay inuu Makedoniya ku soo dhex noqdo. ⁴Waxaana isagii ilaa Aasiya sii raacay Soobater ina Burhus oo reer Beroya ah, iyo Aristarkhos iyo Sekundos oo reer Tesaloniika ah. iyo Gayos oo reer Derbe ah, iyo Timoteyos, iyo Tuhikos iyo Tarofimos oo reer Aasiya ah. ⁵laakiin kuwaasu mar horay tageen oo waxay nagu sugayeen Taroo'as. ⁶Maalmihii liddii Kibistii-aan-khamiirka-lahayn dabadeed waxaannu ka dhoofnay Filiboy, oo shan maalmood ayaan iyagii ugu nimid Taroo'as; taasoo annu toddoba maalmood joognay.

20:1 “Markii rabshaddii dhammaatay dabadeed” Weedhan waxa loo fahmi karaa siyaabo badan. Loogala jeedo in Bawlos uu ka tegay Efesos isla markiiba iyadoo sababtu ahayd rabshaddan ka timid Demetiyas. Bawlos umuu tegin rabshadda aawadeed, laakiin waxa dhammaaday shaqadiisii wacdinta ee uu waday, sida ay tusinayaan hadallada Demetriyas (19:26).

▣ **“Bawlos ayaa xertii u cid diray oo dhiiro geliyey”** Bawlos wuxuu danaynayay wacdinta iyo xer ka dhigista labadaba (cf. aayadda. 2; Matayos. 28:18-20). Injiilku inkasta oo shakhsi aahn loo aqbalo hadana waxa uu yahay goys wadaaga adeeg (cf. I Korintos. 12:7). Ujeeddada laga rabay dadka rumaystayaasha ah ee maxalliga ahi wuxuu ahaa kaniisad!

20:2 “Oo kolkuu meelahaas sii dhex maray” Waxa suurto gala inay sheegayso (1) Illirikam (cf. Rooma. 15:19) ama (2) magaalooyinkii Makedoniya ee Filiboy, Tesaloniika, iyo Boreya.

▣ **“wuxuu yimid dalka Gariigta”** Giriig (*Hellas*) waxa loogala jeedaa Goboladii Roomaanka ee Akiya (19:21). Waxa ugu muhiimsan ee ay sheegaysaa waa Korintos. Bawlos halkan waxa uu ka waday adeeg dheer, wakhtigii uu qoray Rooma. Waxa uu ka warwarsanaa kaniisadda Korintos sida ay tusinayaan I Korintos. 16:5-9 II Korintos. 2:12-13.

20:3 Aayaddani waxay la xidhiidhaa qorshayaashii socdaalka Bawlos. Xaaladaha jira aawadoodna kolba wuu bedelayay. Dhacdada halkan Bawlos wuxuu u arkay xikmad darro inuu raaco doon sida xujay u socota Yerusaaalem sidaas darteedna wuxuu door biday inuu dhulka maro.

▣ **“oo Yuhuuddu sirqool u dhigtay, markuu u dhowaa”** Waxa suurto gala inuu rabay inuu raaco doon xujayi saarantahay oo istaagaysay dekadaha ay Yuhuuddu joogaan oo dhan si ay u gaadhsiiso Yerusaaalem.

▣ **“Soobater, Aristarkhos, Sekundos, Gayos, Timoteyos, Tuxhikos, Tarofimos”** Waxay ahaayeen niman ka kala socday kaniisado kala gedisan iyagoo loo diray inay Bawlos raacaan markii uu hadiyada lacagta ah u waday Yerusaaalem (cf. I Korintos. 16:1-3; II Korintos. 8-9).

1. Soobater waxa suuro gala inuu yahay Soosibatarka Rooma Rooma. 16:21.
2. Aristarkhos waxa lagu sheegay Fal 19:29; 27:2 iyo Kolosay. 4:10.
3. Tuxhikos waxa lagu sheegay Efesos. 6:21-22; Kolosay. 4:7-8; II Timoteyos. 4:12 iyo Tiitos 3:12.
4. Gayos waxa lagu sheegay Fal 19:29.
5. Tarofimos waxa lagu sheegay Fal 21:29 iyo II Timoteyos. 4:20.

Qoraalkan soo socda waxa lagasoo qaatay fasiraaddayda I Korintos (eeg www.freebiblecommentary.org).

▣ **“ururiska”** *Logia* waa erey laga helayo qoraalka Giriigga ee Masar isaga oo ah lacag hadiyada oo loo ururiyay ujeedo diimeed, laakiinse aan la xidhiidhin cashuurta caadiga ah (cf. Moulton, Milligan, *The Vocabulary of the Greek Testament*, p. 377). Halkan sida ay ugu jirto lama garanayo haddii ay sheegayso hadiyad caadi ah ama hadiyad dheeraad ah oo kaniisadda loogu deeqaay. Bawlos waxa uu bilaabay ka fikiritaanka dadka saboolka ah ee jooga Yahuudiya markii uu la sheekaystay Yacquub, Butros, Yooxanaa, iyo Barnabas sida ku xusan Galatiya. 2:10; 6:10. Deeqdan gaarka ah waxa bilaabay kaniisaddii Antiyokh halkaasoo ahayd meeshii ay Bawlos iyo Barnabas ka adeegeen, Fal 11:27-30. Deeqdan waxa lagu sheegay kitaabo dhowra oo ka mida Axdiga Cusub (cf. Rooma. 15:26; II Korintos. 8-9; I Korintos. 16:1). Waxay ahayd isku day lagu dhex dhexaadinayo xidhiidhka u dhexeeya kaniisadda Cibraaniga ah ee hooyada ah iyo tan kuwa aan Yuhuudda aan ahayn.

Bawlos deeqdan marka keliya ah waxa uu ugu yeedhayaa magacyo dhowr ah.

1. sadaqad bixin, Fal 24:17
2. is weheshi, Rooma. 15:26,27; II Korintos. 8:4; 9:13
3. mahad, Rooma. 15:27
4. adeeg, Rooma. 15:27; II Korintos. 9:12”

II Korintos. 8:6,16 dhexdeeda waxay u muuqataa in Tiitos uu sidoo kale metelayay kaniisad. Waxa la yaableh Luukos oo Tiitos aan marna ku sheegay Falimaha Rasuullada. Aragtidu waxay tahay in Tiitos uu ahaa Luukos walaalkiis sidaasi darteedna uu magaciisa ka tegay. Sidoo kale tani waxa laga yaabaa inay sharrixi karto magaca aan lagu dhex xusin II Korintos 8:18, kaas oo kuwo badani u malaynayaa Luukos (Origen ku dhex qoray Eusebius’ *His. Eccl.* 6.25.6; A. T. Robertson’s, *Word Pictures in the New Testament*, p. 245).

F. F. Bruce, *Paul: Apostle of the Heart Set Free*, ayaa waxa uu faallo ka bixinayaa Tiitos iyo Luukos oo walaalo ah.

“Sharraxaad ka mida Luukos oo ka aamusaya qof uu ku kalsoonaa Bawlos oo ahaa Tiitos ayaa waxa uu yahay Luukos walaalkiis; cf. W. M. Ramsay, *St. Paul the Traveler and the Roman Citizen* (London, 1895), p. 390; *Luke the Physician and Other Studies* (London, 1908), pp. 17 f.; A. Souter, ‘Waa xidhiidh ka dhexeeya Luukos iyo Tiitos oo lasoo jeediyay’, *Expository Times* 18 (1906-7), p. 285, iyadoo ‘Xidhiidhka ka dhexeeya Tiitos iyo Luukos’, *ibid.*, pp. 335 f. laakiin haddii xidhiidhkani uu yahay mid adag, markaa waxa suuro gal ah in Luukos uu yahay ‘walaalka’ 2 Korintos 8:18f. (eeg p. 320) waa arrin shaqaynsa: Bawlos ujeedada uu ‘walaalkan’ ula diray Tiitos waxay ahayd inay is kaashadaan dhinaca maamulka ee deeqda gargaarka ah, ujeedadani waxay noqon kartay mid dhibaato keenta haddii lasoo jeediyo dhaleecayn ku saabsan dhiigga ay wadaagaan labadu. Wax ka wanaagsani muu jireen shaki laga qaado labo wada koray oo wada jira” (p. 339 sharaxa #5).

20:5 “nagu” Luukos markale ayuu bilaabaya waxa uu goob joogga u yahay, taasi oo ku kala go’day Filiboyo (cf. Fal 16). Qaybaha “anagu” waxa lagu sheegay 16:10-17; 20:5-15; 21:1-18; iyo 27:1-28:1b.

20:6 “Maalmihii liddii Kibistii-aan-khamiirka-lahayn” Todobadan cisho ee ciidda ee badhtamaha Abriil waxa la socday maalinta iidda Kormarista (Baxniintii 13). Bawlos asalkiisa Yuhuudiga ah ayaa saameeyay sida loo arkay tirsiga. Waxba kama ogin Yuhuud ama Sunaggog ku yaalla Filiboy, sidaas darteedna Bawlos ciiddan umuu qaadanin ujeedooyin u markhaati furiseed (cf. I Korintos. 9:19-23). Waxa laga yaabaa in loo sheegay oo keliya isaga oo qorshaynayay in socdaalkiisi ku beegnaado Yeruusaalem wakhtiga Bentakostiga (20:16).

NASB (UPDATED) TEXT: 20:7-12

⁷Maalintii ugu horraysay ee toddobaadka markaannu isugu nimid inaannu kibis jejebinno, ayaa Bawlos la hadlay iyagii, isagoo ku talo jira inuu maalinta dambe tago, hadalkiina ilaa habeenbadhkii ayuu sii dheereeyey. ⁸Siraaddo badan baa ka baxayay qolladda sare oo aannu ku urursanayn. ⁹Waxaana daaqadda fadhiyey nin dhallinyaro ah oo la odhan jiray Yutukhos, isagoo hurdo weyn la dhacay; oo intii Bawlos weli hadalkii sii dheeraynayay ayaa wiilkii oo aad u hurdaysan dabaqaddii saddexaad ka soo dhacay, oo isagoo meyd ah baa la qaaday. ¹⁰Markaasaa Bawlos hoos u soo degay oo ku dul dhacay isagii, waana isku duubay, isagoo leh, Ha buuqina; maxaa yeelay. naftii waa ku jirtaa. ¹¹Oo markuu dusha aadayna oo kibis jejebiyey oo cunay oo wakhti dheer la hadlay iyagii. ilaa waagii beryay. ayuu markaas ka tegey. ¹²Wiilkiina way keeneen isagoo nool. si aan yarayn baana la qalbi qaboojiyey iyagii.

20:7 “Maalintii ugu horraysay ee toddobaadka markaannu isugu nimid inaannu kibis jejebinno” Tani waxay tusinaysaa kaniisaddii ugu horraysay qaabka kulankooda Axadaha (maalinta shaqo ee ugu horraysa usbuuca) si loo wadaago cunto iyadoo la is weheshanayo (aayadda 11) iyo cashada xasuusta ah (“kibis jebino” waa hadal maldahan oo Axdiga Cusub ah isla markaana tusinaya Cashada Rabbiga). Ciise laftiisa ayaa dejiyay caabudada Axadda markii uu muuqday saddex Axadood oo isku xigta (cf. Yooxanaa 20:19,26; 21:1; Luukos 24:36; I Korintos. 16:2).

Taxanaha *Helps for Translator (The Acts of the Apostles* oo ay leeyihiin Newman iyo Nida, p. 384) ayaa sheegaya in Luukos uu sheegayo wakhtiga Yuhuudda taasi oo ka dhigan habeenimada Sabtida (TEV), laakiinse badanaa tarjumaaduhu waxay ku tilmaamayaan “maalinta ugu horraysa toddobaadka.” Meeshani waa halka keliya ee lagaga dhex isticmaalay Falimaha Rasuullada. Bawlos waxa uu ku dhex adeegsanayaa weedha “maalinta ugu horraysa toddobaadka” I Korintos 16:2 oo keliya, iyadoo sheegaysa Axadda.

☐ **“hadalkiina ayuu sii dheereeyey”** Bawlos waxa uu rabay inuu wax baro oo dhiirri geliyo inta ay suurto galka ka tahay (cf. aayadaha. 2,31).

☐ **“ilaa habeenbadhkii”** Yuhuuddu waxay maalinta bilaabi jireen habeenka sababtu waa Bilowgii 1, Roomaankuna maalinta waxay bilaabi jireen badhtamaha habeenka.

20:8 “Siraaddo badan” Waxa laga yaabaa inuu ahaa jawi kulul. Waxay u muuqataa inuu Luukos isku dayayo sababta ay Yutukhos hurdadu ay u qabatay.

20:9 “nin dhallinyaro ah” Waxa ay tusinaysaa qof dhallin yaro ku ah nolosha. Erey ka duwan ayaa lagu dhex isticmaalay aayadda 12, waxaanay tusinaysaa ilmo yar. Yutukhos waxa uu ahaa dhallin yaro.

☐ **“Yutukhos, hurdo weyn la dhacay; oo intii Bawlos weli hadalkii sii dheeraynayay”** waa fal wakhti xadirka jooga oo mafcuulku soo horreeyo, waxaanay tusinaysaa wacdinta dheer ee kitaabiga ah iyo lulada dhegaystayaasha!

☐ **“oo isagoo meyd ah baa la qaaday”** Waa uu dhintay! Eeg aayadda 12.

20:10 “oo ku dul dhacay isagii,” Bawlos waxa uu sameeyay sida Eliyaas iyo Elisha Axdiga Hore dhexdiisa, oo sara kiciyay qof dhintay (cf. I Boqorradii 17:21; II Boqorradii 4:34). Waxa uu dhegaystayaashiisa u sheegayaa inaanay warwarin, laakiin xaqiiqdii Bawlos dhacdadan wuu ka xumaa!

☐ **“Ha buuqina”** Waa fal wakhti xaadirka jooga oo amar ah isla markaana wata diidmo, waxaanay ka dhigantahay joojinta fal horeba u socday.

2:12

NASB, TEV

“si wayn baana loo qalbi qaboojiyey iyagii”

NKJV, NRSV

“si aan yarayn baana la qalbi qaboojiyey iyagii”

NJB

“si wayn baana loo dhiirri geliyay”

NKJV iyo NRSV waxa ay tusinayaan Luukos oo isticmaalaya hadallada diidmada ah (cf. 12:18; 15:2; 19:11,23,24; 20:12; 26:19,26; 27:20; 28:2).

NASB (UPDATED) TEXT: 20:13-16

¹³laakiin annagoo ka hor marayna, waxaannu aadnay doonnida, oo Asos u dhoofnay, meeshaasoo aannu doonaynay inaannu Bawlos ka qaadno; maxaa yeelay, sidaasuu kula ballamay isagoo ku talo jiray inuu lugeeyo. ¹⁴Oo kolkuu Asos nagula kulmay, waannu soo qaadnay. oo waxaannu nimid Mituleenee. ¹⁵Markaasaannu halkaas ka dhoofnay, oo waxaannu maalintii dambe nimid meel ka soo hor jeedda Khiyos; maalintii kalena waxaannu gaadhnay Samos; maalintii ku xigtayna waxaannu nimid Mileetos. ¹⁶Maxaa yeelay, Bawlos wuxuu goostay inuu Efesos dhaafo, inuusan wakhti Aasiya ku lumin; waayo, wuxuu ku degdegsanaa hadday u suurtoowdo inuu maalintii Bentekost Yeruusaalem yimaado.

20:13 “doonnida,” qorshayaasha socdaalka Bawlos waxay ahaayeen kuwo is bedel ku yimaaddo waxaanu u muuqday mid qorshihiiisu ahaa dhinaca badda (aayadda 3). Waxa laga yaabaa Bawlos inuu rabay inuu ogaado cidda saaran doonta intaanu fuulin ka hor. Bawlos waxa uu dhulka isagoo ka tegay Taroo’as tegayna Assos, halkaasoo uu ka qaadnayey doonta ka imanaysay Taroo’as. Dhammaanba dadka lagu sheegay aayadda 4 waxay ahaayeen kuwo saaran doonta.

20:14 “nimid Mituleenee” Waxay ahayd caasimadda jasiiradda Lesbos. Waxa weeyi jasiiradda ugu wayn xeebta Aasiyada Yar (galbeedka Turkiga).

20:15-16 Waxa la yaab leh sida uu Luukos wax ugu yaqaanay dooni qaadashada. Waxa uu isticmaalayaa erayo badan oo loo isticmaalo dooniyaha (qaybaha “anagu”) Falimaha Rasuullada dhexdooda. Qaybo ka mida qaybaha “anagu” waxay koobsanaysaa socdaal badeedyada! Waxa muuqata inuu ahaa nin aqoon leh oo marar badan socdaalay.

20:15 “Khiyos” Waa jasiirad kale oo ku taalla Badda Aygiyaanka. Waxa weeyi jasiirad dheer oo u dhow xeebta.

☐ **“Samos”** Waa jasiirad kale oo ku taalla dhinaca galbeed ee xeebta Aasiyada Yar, una dhow Efesos.

☐ **“Mileetos.”** Waxay ahayd magaalo muhiima oo ku taalla koonfurta xeebta Efesos dhinaca buurta Wabiga Maiyander. Bawlos halkanuu kusoo degay waxaanu cid u diray hoggaamiyayaasha kaniisadda Efesos. Waxay u jirtay ilaa soddon mayl.

20:16 “Bawlos wuxuu goostay inuu Efesos dhaafo” Waxay u muuqataa in Bawlos uu dhib kala kulmayo doonta dusheeda. Haddii ay sidaas tahay, markaa wa amid ahaan (1) waxay dalbadeen markab iyaga u gaara ama (2) waxay raaceen doon aan istaagayn Efesos.

☐ **“hadday”** Waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah oo tusinaysa doonis.

☐ **“Bentakost”** Waxay ahayd ciidda Yuhuudda oo ah konton casho Kormarista dabadeed. Bawlos waxa uu Kormarista isaga dhaafay sida ku sugan aayadda 3 aawadeed.

FAHANKA MACNAHA GUUD EE FALIMAHA RASUULLADA 20:17-21:16

- A. Waxa halkan ku sugan is difaacitaan, sidii oo qof uu weerar ku hayay Bawlos shakhsi ahaan (cf. aayadda. 33).
- B. Kani waa tusaalaha keliya ee ku sugan Falimaha Rasuullada uguna wanaagsan Bawlos oo wacdinaya rumaystaal. Sida ku sugan Fal 13:16ff waxa uu la hadlayaa Yuhuudda, halka 14:15ff iyo 17:22ff uu kula hadlayo jaahiliintii Giriigta.
- C. Qaybtani waxay la mid tahay warqadaha Bawlos sida qof uu filan karo. Ereyada Bawlos ee gaarka ahi waxay ka muuqanayaan macasalaamayntan. Tani waxay haddaba tusinaysaa Luukos run sheegnimadiisa marka uu qorayo markhaati furka kuwa kale.

NASB (UPDATED) TEXT: 20:17-18b

¹⁷Haddaba Mileetos wuxuu cid uga diray Efesos, waana u yeedhay waayeelladii kiniisadda.
¹⁸Markay u yimaadeenna wuxuu iyagii ku yidhi,

20:17 “Mileetos” Dekeddani waxay dhinaca koonfureed ku dhowaad 30 mayl kaga beegnayd Efesos.

☐ **“waayeelladii”** waxa aan ereygan (*presbuteros*) ka helaynaa “Presbyter” ama “Presbyterian.” Fal 20:17,28 iyo Tiitos 1:5,7 aawadood ereyada “waayeello” (*presbuteroi*) iyo “beeldaajiye” (*episcopoi*) waxa ay la mid yihiin ereyga “wadaad” (*poimenos*, cf. Efesos. 4:11). Ereyga “waayeel” waxa uu asal ahaan la xidhiidha Yuhuudda (hogaamiyo qabiileedyada Yuhuudda) halka “beeldaajiye” uu kala xidhiidho maamulaha magaalo siyaasadeed oo xagga Giriigga ah.

Waxa jira labo kooxood oo ah hoggaamiyayaasha hoose ee kaniisadda isla markaasna lagu sheegay Axdiga Cusub waana wadaaddada iyo gudiyada (Filiboy 1:1). Waxa laga yaabaa inay jiray saddex kooxood oo lagu diiwaan geliyay I Timoteyos 3, kuwaasoo koobsanaya carmalka (Rooma 16:1).

U fiirso iyadoo ereygu yahay jamac. Waxa tani ay markaa tusinaysaa hoggaamiyayaasha kaniisad guriyeedka (cf. 11:30; 14:23; 15:2, 4,6,22-23; 16:4; 21:18; I Timoteyos. 5:17, 19; Tiitos 1:5; Yacquub 5:14; I Butros. 5:1).

☐ **“kaniisadda”** Ereygan Giriiggiisu (*ekklesia*) waxa uu yahay mid loo isticmaalay ururka tuulo (cf 19:39). Si kastaba ha ahaatee, waxa laga tarjumay ereyga Axdiga Hore ee loo isticmaalo “ururka (*qahal*) Israa’iil” Sabtuujantiga dhexdiisa. Kaniisaddii ugu horraysay waxay u isticmaashay isu imaatinka rumaystayaasha waayo waxa lagu tilmaami jiray Axdiga Hore dhexdiisa dadka Ilaah. kaniisadda Axdiga Cusubi waxay isu arkeen inay yihiin ay Ciise Masiixa dartiis ku yihiin dhammaystirka ballan qaadyadii Axdiga Hore. Eeg Mawduuca Gaarka ah at 5:11.

NASB (UPDATED) TEXT: 20:18b-24

^{18b}Idinka qudhiinnuba waad garanaysaan sidii aan wakhtiga oo dhan idinkula joogay tan iyo maalintii iigu horraysay oo aan Aasiya cag saaray, ¹⁹anigoo Rabbiga ugu adeegaya is-hoosay-siin oo dhan, iyo ilmo, iyo jirrabaaddaha igu dhacay markii Yuhuuddu sirqoollada ii dhigtay; ²⁰iyo sidii aanan waxba idiinkala hadhin wixii idiin faa’iido lahaa inaan idiin sheego oo caddaan idinku baro guri ilaa guri, ²¹anigoo Yuhuudda iyo Gariigta labadoodaba uga warramaya si ay Ilaah ugu toobad keenaan oo ay u aaminaan Rabbigeenna Ciise Masiix. ²²Hadda bal eega. Yerusaaalem baan tegayaa anoo Ruuxa ku xidhan oo aan garanaynin waxyaalaha halkaas igaga dhici doona; ²³in Ruuxa Qoduuska ahi magaalo kasta iigu markhaati furo mooyaane. isagoo leh, Waxaa ku sugaya silsilado iyo dhibaatooyin. ²⁴laakiin naftayda uma xisaabo sidii mid qiimo ila leh, si aan u dhammeeyo tartankayga iyo shuqulkii aan Rabbi Ciise ka helay inaan u markhaati furo injiilkii nimcadii Ilaah.

20:18 “Idinka qudhiinnuba waad garanaysaan sidii aan wakhtiga oo dhan idinkula joogay” Bawlos soedkiisa iyo hadalkiisu waxay tusiyeen xidhiidhka uu la leeyahay Masiixa. xaqiiqada uu Bawlos sidan u leeyahay sid aku xusan aayadaha. 18-19 waxay tusinaysaa inay eedi taallay.

20:19 “Rabbiga ugu adeegaya is-hoosay-siin oo dhan” Waxay ku bilaabmaysaa waxyaalo Masiixiyaddu ay soo jeedinayso oo keenaya midnimada (cf. Efesos. 4:2-3). “is hoosaysiintu” waxay ahayd arrin u gaar ah Masiixiyiinta oon lagu aqoonin Giriigta dhaqamada. Muuse (cf. Tirintii. 12:3) iyo Ciise (cf. Matayos. 11:29) ayaa ereygan lagu sheegay. Bawlosna marar badan ayuu isticmaalayaa (cf. Efesos. 4:2; Filiboy. 2:3; Kolosay. 2:18,23; 3:12).

MAWDUUC GAAR AH: SHARKA IYO KHAYRKA

Sharka iyo khayrka ayaa labadooduba ah kuwo ku diiwaan gashan Axdiga Cusub dhexdiisa. Haddaba, noocyada sharka iyo khayrka ee Axdiga Cusub ayaa waxay yihiin sidan:

	<u>Sharka</u>	<u>Khayrka</u>
1. Bawlos	Rooma 1:28-32	---
	Rooma 13:13	Rooma 2:9-21
	1 Korintos 5:9-11	---
	6:10	1 Korintos 6:6-9
	2 Korintos 12:20	2 Korintos 6:4-10
	Galatiya 5:19-21	Galatiya 5:22-23
	Efesos 4:25-32	---
	5:3-5	---
	---	Filiboy 4:8-9
	Kolosay 3:5,8	Kolosay 3:12-14
	1 Timoteyos 1:9-10	---
	6:4-5	---
	2 Timoteyos 2:22a, 23	2 Timoteyos 2:22b, 24
	Tiitos 1:7, 3:3	Tiitos 1:8-9; 3:1-2
2. Yacquub	Yacquub 3:15-16	Yacquub 3: 17-18
3. Butros	1 Butros 4:3	1 Butros 4:7-11
	2 Butros 1:9	2 Butros 1:5-8
4. Yooxanaa	Muujintii 21:8;	---
	22:15	---

▣ **“ilmo, iyo jirrabaaddaha”** Bawlos waxa uu sheegayaa waxyaalaha jidh iyo caadifad ahaaneed ee soo food saaray isaga oo ah Rasuulka kuwa aan Yuhuudda ahaynsida ku xusan II Korintos. 4:7-12; 6:3-10; 11:24-28. Qiimayaasha adeegga!

▣ **“igu dhacay markii Yuhuuddu sirqoollada ii dhigtay”** waxa jira tusaalayaal dhowra oo ah “shirqoolladan” kuna sugan Falimaha Rasuullada (cf. 9:24; 13:45,50; 14:2,4,5,19; 17:5,13; 18:12; 20:3; 21:27; 23:12,27,30; 24:5-9,18-19).

20:20 “waxba idiinkala hadhin” waa erey la xidhiidha doomaha (cf. 20:27, fal tegay oo wax tusmaynaya) loona adeegsado xadhkaha loo tuuro doontu marka ay soo xidhanayso.

▣ **“wixii idiin faa'iido lahaa”** Bawlos wuxuu iyaga baray waxkasta oo la xidhiidha injiilka: sida loo aqbaloo, sida loola noolaado, sida loo difaaco, iyo sida loo faafiyo.

▣ **“inaan idiin sheego oo caddaan idinku baro guri ilaa guri”** Waxa loogala jeedaa in Bawlos aanu ku barin oo keliya meelaha fagaaraha ah ee lagu kulmo (aan ahayn kulamo qarsoodi ah), laakiin uu ku baray guryaha keli keli (ama guri kaniisadeedyada). Ujeedadu waxay tahay inay si fiican u yaqaaneen sida Bawlos ula dhaqmay iyaga iyo wxii uu ku yidhi.

Bawlos waxa weeraray kooxo hoose, tanina waa sida uu isku difaacayo ee uu isaga fogaynayo eedda.

20:21 “anigoo Yuhuudda iyo Gariigta labadoodaba uga warramaya” Waxa jirta farriin keliya oo labadoodaba u ahaatay. La hadlitaankoodu wuu kala duwanaa laakiinse muhiimaddu waa isku mid sida ku sugan wacdinaha ku qoran Falimaha Rasuullada (*kerygma*, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:14). Bawlos waxa uu muhiimadda koobaad ee ku wacdinta injiilka siiyay Yuhuudda (cf. Rooma. 1:16; I Korintos. 1:18,24).

▣ **“Ilaah ugu tobad keenaan oo ay u aaminaan Rabbigeenna Ciise Masiix”** towbad keenku waa bedelitaanka maanka (erey Giriig ah), oo uu la socdo is bedel ficilka ahi (erey Cibraani ah). waxa weeyi mid ka mida ugu yaraan waxyaalaha looga baahan yahay badbaadada. Ka kale waxa weeyi iimaan lagu yeesho Rabbigeenna Ciise (cf. Markos 1:15; Fal 3:16,19; eeg Mawduuca Gaarka ah ee 3:16). Midi waa diidmo (ka jeedsashada nafta iyo denbiga). Midna waa wanaag (u jeesashada Ciise Masiix iyo dhimashada uu beddelkeena u dhintay). Labaduba waxay yihiin kuwo la rabo. Waxa aan u imid in aan rumaysto in ay jiraan waxyaalo dhowra oo laga rabo Axdiga Cusub: hubaashii ugu horrayn towbad keen iyo rumaysad joogto ah, laakiin ay la socdaan addeecitaan iyo dadaal.

Waxa jira kala duwanaansho qoraalka Giriigga ee hore ah oo khuseeya “Rabbigeenna Ciise Masiix.” Magaca “Masiix” kuma jiro qoraal gacmeedka B (Vaticanus), laakiin waxa uu ku jiraa P⁷⁴, 8, A, iyo C. Sida ay u badan yihiin kala duwanaanshuhu, saamayn kuma yeelanayaan macnaha tuduca. UBS⁴ qoraalkiisa Giriigga ahi waxa uu rumaysan yahay in akhrinta gaabani ay “hubaal tahay” waayo ma jirto sabab ay culimmadu u masixi karaan, laakiinse daliilku waxa uu yahay iyaga oo fidiyay oo buuxiyay weedha buuxda ee la filayo (eeg Lifaaqa Labaad: Dhaleecaynta Qoraallada).

20:22

NASB

“Ruuxa ku xidhan”

NKJV

“Ruuxa ku xidhan”

NRSV

“Ruuxa u xidhan”

TEV

“addeecaya Ruuxa Quduuska ah”

NJB

“Ruuxa maxbuus u ah”

Waa fal dhammays tiran oo mafcuulku soo horreeyo. Waxa uu tusinayaa macnaha ah hoggaaminta Ilaahiga ah ee Bawlos (cf. 18:21; 19:21; 20:23; I Korintos. 4:19; 7:40; 16:7). Eeg Mawduuca Gaarka ah: Ruuxa (*pneuma*)Axdiga Cusub dhexdiisa 2:2 iyo sharraxa 19:21. Ruuxa Quduuska ah waxa lagu sheegay aayadda 23.

20:23 “Ruuxa Qoduuska ahi magaalo kasta iigu markaati furo mooyaane. isagoo leh, Waxaa ku sugaya silsilado iyo dhibaatooyin.” Waxa sidan lagu sameeyay nebiyo kala duwan iyadoo Ruuxa Quduuska ahi uu ku

war geliyay Bawlos (cf. Fal 9:16; 21:4, 10-12). Badanaa Ilaah waxa uu diraa oo adeegsadaa wax u muuqda diidmo, isagoo ka dhigaya dhinaca wanaagsan (cf. Ishacyaah. 55:8-11). Bawlos muu arkaynin dhibaato saaran isaga intuu rumaysnaa Ilaah oo ujeedooyinkiisa u adeegsanaya.

20:24 “naftayda uma xisaabo sidii mid qiimo ila leh” Fikiritaanka noocan ahi waxa uu kasoo horjeeda dabeecadda aadanaha leexday ee naftooda uun ka fikira. Masiixiyiintu waxa ay haystaan aragtiyo dunida ah oo kala duwan. Waxay u dhinteen nafta iyo denbiga waxaanay u noolyihiin Ilaah (cf. Rooma 6; II Korintos. 5:14-15; Galatiya. 2:20; I Yooxanaa 3:16). Nafta oo loo dhintaa waxa ay keenaysaa ka xoroobitaanka damaacinimada.

▣ **“si aan u dhammeeyo tartankayga”** Waa erey loo adeegsado tartanka orodada. Bawlos waxa uu jecelyahay inuu isticmaalo ereyada loo adeegsado tartanka orodada. Waxa uu noloshiisa uga hadlayaa marar badan sidii oo uu tartan ku jiro (cf. I Korintos. 9:24-27; Galatiya. 2:2; 5:7; Filiboy. 2:16; 3:14; II Timoteyos. 2:5; 4:7). Bawlos waxa uu rumaysnaa in Ilaah noloshiisa uu ka leeyahay ujeedooyin iyo qorshayaal gaar ah.

▣ **“shuqulkii aan Rabbi Ciise ka helay”** Bawlos yeedhitaankiisa waxa uu ku helay Dimishiq markii uu kusii jeeday (cf. Fal 9). Rumaystaasha oo dhami waxay yihiin adeegayaal loo yeedhay oo hadiyado leh (cf. Efesos. 4:11-12). Rumaysashadani waxay bedelaysaa sida aan u noolnahay (cf. II Korintos. 5:18-20). Waxa aan nahay niman iyo dumar adeegayaal ah! waxa la inoo badbaadiyay inaan adeegno. Waxa aan nahay kuwa xambaarsan injiilka iyo hadiyado.

▣ **“injiilkii nimcadii Ilaah”** aadanaha leexday rajada ay leeyihiin oo keli ahi waxa weeyi nimcada iyo naxariista wayn ee Eebbe oo aan lahayn is bedel. Ilaah isku muujiyay Saddexmidnimadu waxa uu ina siiyay wax kasta oo nolosheenu u baahan tahay. rajadeenuna waxa weeyi uu yahay Isagu iyo Muxuu sameeyay.

Waxa la yaab leh sida Luukos u adeegsanayo magaca “injiil” (Luukos kuma jirto, waana labo jeer Falimaha Rasuullada, 15:7; 20:24), laakiin falka ayuu isticmaalayaa marar badan kitaabadiisa marka la eego.

NASB (UPDATED) TEXT: 20:25-35

²⁵Hadda, bal eega, waxaan ogahay in dhammaantiin oo aan ku dhex wareegi jiray oo aan boqortooyada ku wacdiyi jiray aydnaan mar dambe wejigayga arki doonin. ²⁶Sidaas daraaddeed waxaan maanta idiinku warramayaa inaan daahir ka ahay dadka oo dhan dhiiggiisa. ²⁷Maxaa yeelay, dib ugama noqon inaan talada Ilaah oo dhan idiin sheego. ²⁸Qudhiinnu isjira, idahana jira, kuwaasoo Ruuxa Qoduska ahu idiinka dhigay beldaajiyayaal inaad daajisaan kiniisadda Ilaah oo uu dhiiggiisa ku iibsaday. ²⁹Waxaan ogahay markaan tago dabadeed inay idin dhex geli doonaan uubatooyin xunxun iyagoo aan idaha wax ka reebaynin: ³⁰oo waxaa idinka dhex kici doona niman waxyaalo qalqalloocan ku hadlaya inay xertii u jiitaan xaggooda. ³¹Sidaas darteed, soo jeeda, idinkoo xusuusanaya in intii saddex sannadood ah aanan ka joogsan inaan mid kasta habeen iyo maalinba waaniyo anigoo ilmaynaya. ³²Imminka waxaan idinku ammaano gelinayaa Ilaah iyo hadalka nimcadiisa kaasoo kara inuu idin dhiso oo dhaxal idinka dhex siiyo kuwa qodus laga dhigay oo dhan. ³³Ma aan damcin ninna lacagtiis, ama dahabkiis, ama dharkiis. ³⁴Idinka qudhiinnu waad og tihii inay gacmahanu u adeegeen waxaannu u baahnayn aniga iyo kuwii ila joogayba. ³⁵Wax walba waan idin tusay si ay waajib idiinku tahay, idinkoo sidaas oo kale u hawshoonaya, inaad caawisaan kuwa itaalka yar, oo aad xusuusataan hadalladii Rabbi Ciise siduu isaga qudhiisu yidhi, In wax la helo, waxaa ka barako badan in wax la bixiyo.

20:25 “waxaan ogahay in ...aydnaan mar dambe wejigayga arki doonin” Waxa uu qorshaynayay inuu tago Isbaaniya (cf. Rooma. 15:24,28), laakiin waxa suurto gal ah inuu sii sheegayay waxyaalaha ku imanaya sida in la xidhi dhoono, ama inuu ku dhiman doono Yerusaaalem. Haddii Warqaduhu ay sheegaan socdaalka adeegitaan ee afraad ee Bawlos markaa wuu kusoo laabtay halkan markale.

1. Efesos, I Timoteyos. 1:3; 3:14; 4:13
2. Miletus, II Timoteyos. 4:20
3. waxa suuro gala xitaa Taroo’as, II Timoteyos. 4:13.

Bawlos waxa uu rumaysnaa hoggaaminta Ilaah. Muu ogsoonayn mustaqbal gaar ah.

▣ **“boqortooyada ku wacdiyi jiray”** eeg sharraxa 2:34.

20:26 “inaan daahir ka ahay dadka oo dhan dhiiggiisa” Waa weedh maldahaada oo Yuhuuddu adeegsato, sida Fal 18:6, ama si gaar ah Yexesqeel. 3:16ff iyo 33:1ff. Bawlos si runa ayuu injiilka uga hadlay (cf. II Korintos. 2:17). Hadda kuwa aqbalay iyo kuwa diiday waxa ay tahay go’aankooda u gaarka ah. Midi waa inuu adeego, ka kalena waa inuu wax baabi’iyo (cf. II Korintos. 2:15-16).

20:27 “dib ugama noqon” eeg sharraxa 20:20.

▣ **“talada Ilaah oo dhan”** Waa inaan hadiyo goor faafino farriinta Ilaah ee buuxda, oon ahayn qaybta aan jecelnahay oo keliya! Waxa laga yaabaa in middani ay u noqonayso kuwii Yuhuudda ahaa ee sheegay in Bawlos uu ka tegay qayb ka mida farriinta (Sharciiga Muuse-diinta Yuhuudda) ama kuwa ku sugan II Korintos 12 ee sheegay inaanu Bawlos lahayn khibrad ruuxi ahaaneed. Ujeedada Ilaah waxa weeyi in aadanuhu ay isaga la yeeshay weheshi buuxa, taasi oo ahayd ujeedadii abuurka (cf. Bilowgii. 1:26,27; 3:8; 12:3).

20:28 “Qudhiinnu isjira” Waa fal amar ah oo wakhti xaadirka jooga. Waxa sidan oo kale laga heli karaa I Korintos. 16:13; Kolosay. 4:2; I Tesaloniika. 5:6,10. Nolosha Masiixiyaddu waxay isugu jirtaa ilaahi iyo dhinac aadane ah. Ilaah isaga ayaa hadiyo goor wax bilaaba oo dejiya qorshayaasha, laakiin rumaystayaashu waa inay ku socdaan marwalba ka jawaab celin. Dhinac marka laga eegana waxa aan masuul ka nahay nolosheenna ruuxiga ah (cf. Filiboy. 2:12-13). Waxa runta ku ah rumaystaha kelida ahina sidoo kale waxa uu run ku yahay hoggaamiyayaasha kaniisadaha (cf. I Korintos 3).

▣ **“idahana jira”** Waxa weeyi tusaalaha lagu shabaho dadka Ilaah (cf. Sabuurka 23; Luukos 12:32; Yooxanaa 21:15-17). Sidoo kale waxa weeyi asalka ereyga “wadaad.” Eeg sharraxa 20:17. Hoggaamiyayaasha kaniisaduhu waxa ay masuul nafhooda uga yihiin Ilaah iyo kaniisadooda (cf. I Korintos 3).

▣ **“Ruuxa Qoduuska ahu idiinka dhigay”** Waxa ay tusinaysaa yeedhitaanka ilaahiga ah ee Ilaah uu ku doorto hoggaamiyayaasha kaniisadaha.

▣ **“beldaajiyayaal”** eeg sharraxa 20:17.

▣ **“kiniisadda Ilaah”** “Ilaah” waxa laga helayaa qoraal gacmeedyadii hore ee Giriigga P⁷⁴, A, C, D iyo E, halka “Rabbi” laga helayo MSS a iyo B. Bawlos waxa uu isticmaalayaa weedha “kaniisadda Ilaah” marar badan, laakiin ma weligii ma isticmaalaya “kaniisadda Rabbiga.” Macnaha halkan ka muuqdaa waxa uu taageeraya “kaniisadda Rabbiga” waayo weedha ku xigtaa waa “dhiiggiisa,” taasi oo hubaashii tilmaamaysa Masiixa. Si kastaba ha noqotee, tani waxay ka mid tahay arrin ku iman karta beddelka culimada sida la filan karo (eeg Bruce M. Metzger, *A Textual Commentary*, pp. 480-482). Sidaas darteed UBS⁴ qoraalka Giriigga wuxuu soo celinayaa “Ilaah,” laakiin wuxuu ku bixinayaa “C.” ereyga “Rabbi” waxa uu noqon karaa akhriska ugu adag ee aan caadiga ahayn (eeg Lifaafa Labaad: Dhaleecaynta Qoraallada).

Qoraalkani waxa weeyi tusaale wanaagsan oo ah sida culimadu arrimo fiqi ahaaneed darteed ay u beddeleen qoraalka. Falaqayn wanaagsan oo arrintan ku saabsan waxa laga heli karaa Bart D. Ehrman kitaabkiisa *The Orthodox Corruption of Scripture*, pp. 87-89. Culimadu waxay ku baraarugeen qoraallo xooggan oo caqiido ahaan kasoo horjeeda bidcooyinkii wakhtigooda jiray. Fal 2028 waxa uu bixinayaa beddelo kala duwan oo la xidhiidha taariikhda ama fiqiga.

Inta aynaan faraha la galin wax laga yaabo waa in aan xasuusano Axdiga Cusubi inuu leeyahay dhaqan qoraal oo ka wanaagsan qoraaladii qadiimiga ahaa. inkasta oo aynaan si saxa u hubin karin ereyaynta asalka ah, ilaa hadda waxaan haysanaa qoraal sax ah. Ereyada asalka ahina waxay yihiin kuwo kala duwan. Kala duwanaanshahani ma samaynayo caqiido muhiima! Eeg See *Rethinking New Testament Textual Criticism* ed. David Alan Black.

▣ **“oo uu dhiiggiisa ku iibsaday”** Tani waxay ka tarjumaysaa arrinta Axdiga Hore ee la xidhiidha qurbaanka beddelka ah (cf. Laawiyyintii 1-7; Ishacyaah 53). Xoojinta sidan oo kale ah si la mida looguma sheegin *kerygma* Falimaha Rasuullada (eeg James D. G. Dunn, *Unity and Diversity in the NT*, pp. 17- 18). Sidoo kale waxa ay caddayn xooggan u tahay ilaahnimada Ciise (i.e., “kaniisadda Ilaah”). Bawlos waxa uu marar badan isticmaalayaa weedho tilmaamaya xaqiiqadan (cf. Rooma. 9:5; Kolosay. 2:9; Tiitos 2:13).

Waxa kaloo suurto gal ah in weedhan Giriigga ah loo tarjumo “uu iibsaday,” iyadoo ku macno dhow (i.e., Wiilkiisa Ciise). F. F. Bruce, *Commentary on the book of the Acts*, p. 416 #59, ayaa odhanaya , weedhan waxa loo tarjumayaa “qiimaha dhiiggiisa,” taasi oo laga heli karo qoraallada Masriga Qadiimiga ah.

20:29 “inay idin dhex geli doonaan uubatooyin xunxun” Kani waa shabahaadda lagu saleeyay shabahaadda hore ee “ido” iyo “adhijire.” Waxa ay ka hadlaysaa dhibaataada macallimiinta beenta ah, kuwa dibadda (aayadda 29) iyo kuwa gudaha (aayadda 30). Labaduba waxay ku imanayaan haraga idaha (cf. Matayos. 7:15-23; Luukos 10:3; Yooxanaa 10:12, sidoo kale qoraallada abokalaybtiga, I Enoch 89:10-27; IV Ezra 5:18). Rumaystayaashu waa inay tijaabiyaan kuwo sheeganaya inay ku hadlayaan magaca Ilaah (cf. I Yooxanaa 4:1). Ku tijaabiya siday u rumaysan yihiin injiilka, erey iyo camal ahaanba (cf. aayadaha. 18-24; Matayos 7; Rooma. 16:17-18).

20:30 “waxyaalo qalqalloocan ku hadlaya” “ku hadlaya” waa fal wakhti xaadirka jooga, halka “waxyaalo qalqalloocan” ay ka tahay fal dhammays tiran oo mafcuulku soo horreeyo. Macnaheeda asaasiga ahi waa “qalloocan.” Waxa lagu tilmaamay aadanaha (cf. Luukos 9:41; Filiboy. 2:15). Arrinta sidan ah waxa lagu sheegay II Butros. 3:15-16.

▣ **“inay xertii u jiitaan xaggooda”** su’aasha fiqi ahaaneed waa, “kuwa la jiitay ruuxi ahaan miyay lumeen mise way wareereen?” (cf. Matayos. 24:24). Waxa aan suurto gal ahayn qaflad lagu jire balse iimaanka runta ahi uu sii socdo! (cf. I Yooxanaa 2:18).

MAWDUUC GAAR AH: HABAABINTA (APHISTĒMI)

Ereygan Giriigga ah ee *aphsitēmi* waxa uu leeyahay boos balaadhan oo semantic ah. Arrintu se si kastaba ha ahaatee, ereyga Ingiriisiga ah “apostasy” waxaa laga soo qaatay ereygan waxaana ku daristeeda loogu danaynayey akhristayaasha casriga ah. Had iyo goor waa sida ay tahay, macnaha guud ayaa ah furaha, ma aha in qeexitaan la eego.

Waa erey isku xidhan oo ka yimid meeleeeye *apo*, oo macnihiisu yahay “ka yimid/ka timid” ama “ka fog” iyo *histēmi*, “in lagu fadhiisto,” “lagu istaago,” ama “in cayimo ama meel lagu ekeeyo.” Xusuusnow adeegisyada soo socda ee aan (fiqiga ahayn):

1. In si muuqaal ahaaneed looga guuro
 - a. Macbudka, Luukos 2:37
 - b. Guri, Markos 13:34
 - c. Qof, markos 12:12; 14:50; Falimaha Rasuullada 5:38
 - d. Shayada oo dhan, Matayos 19:27,29
2. In loo guuro si siyaasadeed, Falimaha Rasuullada 5:37
3. In loo guuro si xidhiidh ahaaneed, Falimaha Rasuullada 5:38; 15:38; 19:9; 22:29
4. In loo guuro si sharci ah (furriin), Sharciga Ku Noqoshadiisa 24:1,3 (LXX) iyo Axdiga Cusub, Matayos 5:31; 19:7; Markos 10:4; I Korintos 7:11
5. In loo lacag qaan ah awgeed, Matayos 18:24
6. In la muujiyo in wax dan ah uusan lahayn tegitaanku, Matayos 4:20; 22:27; Yooxanaa 4:28; 16:32
7. In dan laga muujiyo in aan la guurin, Yooxanaa 8:29; 14:18
8. In loo oggolaado ama loo fasaxo, Matayos 13:30; 19:14; Markos 14:6; Luukos 13:8

Marka macnaha fiqi ahaaneed la eegana adeegsi balaadhan ayuu ereygan fal sameeyaha ahu leeyahay:

1. In la kansalo, ku celin, in la maro qabistii dembiga, Baxniintii 32:32 (LXX); Tirintii 14:19; Ayuub 42:10 iyo Axdiga Cusub, Matayos 6:12,14-15; Markos 11:25-26
2. In laga fogaado dembiga, II Timoteyos 2:19
3. In la dayaco iyadoo laga saarayo

- a. Sharciga. Matayos 23:23; Falimaha Rasuullada 21:21
- b. Rumaysadka, (Yexesqeel 20:8 (LXX); Luukos 8:13; II Tesaloniika 2L3; I Timoteyos 4:1; Cibraaniyada 2:13

Rumaystayaasha waqti casrigan waxa ay is weyddiiyaan su'aalo fiqi ah oo ah in qoraayaashii Axdiga Cusub aysan ahayn in marna ay fakareen. Mid kuwan ka mid ah waxa ay la xidhiidh sanaan lahayd dareenka casriga si rumaysadka looga sooco rumaysadka buuxa.

Waxaa shaqsiyaad ku jira baybalka oo ku lug lahaa dadka Ilaah oo ay wax dhacaan.

1. Axdigii Hore

- A. Kuwii maqlay labo iyo tobankii wax soo tebintii basaasiinta, Tirintii 14 (cf. Cibraaniyada 3:16-19)
- B. Qorax, Tirintii 16
- C. Wiilashii Ceelii, I Samuu'eel 2.4
- D. Saa'uul, I Samuu'eel 11-31
- E. Nebiyada beenta ah (tusaaleyaal)
 1. Sharciga Ku Noqoshadiisa 13:1-5; 18:10-22 (waddooyinka lagu garto nebiga beenta ah)
 2. Yeremyaah 28
 3. Yexesqeel 13:1-7
- F. Nebiyadaha beenta ah
 1. Yexesqeel 13:17
 2. Nexemyaah 6:14
- G. Hoggaamiyeyaashii sharka lahaa ee Israa'iil (tusaaleyaal)
 1. Yeremyaah 5:30-31; 8:1-2; 23:1-4
 2. Yexesqeel 22:23-31
 3. Miikaah 3:5-12

II. Axdiga Cusub

- A. Ereygan Giriigga ah waxa uu si toos ah u noqonayaa *apostasize*. Axdigii Hore iyo Kan Cusub hadalladoodu waxa ay caddaynayaa si ay yihiin sharka iyo wax barista beenta ah Imaanshada Labaad ka hor (cf. Matayos 24:24; Markos 13:22; Falimaha Rasuullada 20:29.30; II Tesaloniika 2L9-12; II Timoteyos 4:4). Ereygan Giriigga ah waxa uu ka tusaale bixinayaa ereyadii Ciise eek u jiray masaalkii carrada ee Matayos 13; Markos 4; iyo Luukos 8. Macallimiintan beenta ahu sida cad ma aha Masiixiyiin, laakiin waxa ay ka soo baxeen masiixiyiinta gudahooda (cf. Falimaha Rasuullada 20:29-30; I Yooxanaa 2:19); arrintu si kastaba ha ahaatee, awood ayey u leeyihiin in ay sasabtaan oo ay qabsadaan rumaystayaasha aan weli qaan gaadhin (cf. Cibraaniyada 3:12).

Su'aasha fiqi ahaaneed waxaa weeye, miyey macallimiinta beenta ahu weligiid ahaayeen rumaystayaal? Tan aad ayey u adag tahay in laga jawaabo maxaa yeelay waxaa kaniisadaha deegaanka ku dhex jiray macallimiin been ah (I Yooxanaa 2:18-19). Inta badan waxaa su'aashan ka jawaaba hab dhaqankeenna fiqi ahaaneed iyadoo aan wax tixraac ah laga soo qaadanayn Baybalka (marka laga reebo in laga soo xiganayo qodob qeexan oo qoraal xigasho aayad laga soo qaadanayoo aan ku jidhin ama laga helayn wax macne la dhadhansan karo, haddii aan loogu talo gelin in mid loogu eexdo).

B. Rumaysad cad

1. Yuudas, Yooxanaa 17:12
2. Simon Magnus, Falimaha Rasuullada 8
3. Kuwii looga hadlay Matayos 7:13-23
4. Kwii looga hadlay Matayos 13; Markos 4; Luukos 8
5. Yuhuuddii Yooxamaa 8:31-59
6. Alexander iyo Hymenaeus, I Timoteyos 1:19-20
7. Kuwii I Timoteyos 6:21
8. Hymenaeus iyo Philetus, II Timoteyos 2:16-18
9. Demas, II Timoteyos 4:40
10. Macallimiinta beenta ah, II Butros 2:19-22; Yuudas aayadaha. 12-19

11. Kuwa Masiix ka soo hor jeeda, I Yooxanaa 2:18-19
- C. Rumaysadka midho la'aanta ah
 1. I Korintos 3:10-15
 2. II Butros 1:8-11

Si dhifdhif ah ayaan qoraalladan uga fakarnaa sababta oo ah qaabka fiqiga (Calvinism, Arminianism, e.t.c) ay qayaa faraha ku haya heerka ugu dambeeya ee jawaabta. Fadlan moray ha ii xukumina maxaa yeelay anigu waan soo saaray uun maaddada. Ujeedkaygu waxa uu ahaa in aan xeer soo saaro. Aan u daynno in Kitaabka Qudduuska ahu naf ahaantiisa nala hadlo si ay ugu qasin fiqiga. Tani sida badan way xanuun iyo argaggax badan tahay maxaa yeelay sida uu fiqigeennu u badan yahay waa madhab, dhaqan, ama xidhiidh sida (waalid, saaxiib ama wadaad kaniisadeed), ma aha mid baybal ahaaneed. Qaar ku dhex jira dadka Iaal ayaa baxaya in aysan ku sii dhex jirin dadka Ilaah (i.e., Rooma 9:6).

20:31 “soo jeeda” Waa fal amar ah oo wakhti xaadirka taagan (cf. Markos 13:35), kaasoo la mid ah aayadda 28, “Qudhiinnu isjira” (fal wakhti xaadirka jooga oo amar ah). hoggaamiyayaasha Ilaah iyo kaniisadda Ilaah waa inay iska jiraan macallimiinta beenta ah, maah aoo keliya kuwa aan waxba inaga ogsoonayn, balse kuwa aan waxba ka ogsoonayn ee jaahilka ka ah injiilka iyo qaab nololeedkiisa.

▣ **“ntii saddex sannadood ah”** Waxa ay tilmaamaysaa Bawlos intii uu joogay Efesos. Sheegitaanka wakhtiganina waxa uu koobsanayaa intii Bawlos uu adeegga ka wadan agagaarkan. Waxa uu la joogay rumaystayaashan kaddibna magaalo, kaniisad ama meel kale. waxay barteen injiilka, iminkana waa in ay ilaaliyaan oo faafiyaan weliba.

20:32 “ammaano gelinayaa Ilaah” Waxa macneheedu yahay “idinku hallaynayaa” (cf. 14:23). Waxa aan Ilaah uga masuul nahay injiilka la inagu halleeyay (cf. I Timoteyos. 1:18). Waxa aan masuuliyadi inaga saarantahay inaan gaadhsiino oo u dhaafno kuwa iyaguna sii fidinaya (cf. II Timoteyos. 2:2).

Magaca “Ilaah” waxa laga helayaa MSS P⁷⁴, x, A, C, D, iyo E. ereyga “Rabbi” waxa laga helayaa MS B. UBS⁴ waxa uu ku *Theos* ku darayaa “B” (hubaal).

▣ **“iyo hadalka nimcadiisa”** Waxa ay la mid tahay weedha “injiilka.” Eeg sharaxa aayadda. 24.

▣ **“kaasoo kara inuu idin dhiso”** Fiiro u yeelo in ay tahay shakhsiga iyo runta Ilaah (injiilka) kan qaan gaadhnimada keenayaa (cf. 9:31). Bawlos shabahaadan in badan ayuu isticmaalayaa. Ereygan Giriigga ah waxa loo tarjumi karaa “dhisid” (cf. I Korintos 14). Tani waa ujeedada injiilka oo ah inaanu dhisin qof keliya, balse kaniisadda oo dhan.

MAWDUUC GAAR AH: DHISIDDA

Eraygan ah *oikodomeō* iyo qaababkeeda kala gedisan waxa adeegsaday Bawlos. Fahankeeda caadi ahaaneed waxa weeyi “in la dhiso guri” (Matayos 7:24), laakiin tusaale ahaan waxa loo adeegsan karaa:

1. Jidhka Masiixa, kaniisadda, I Korintos 3:9; Efesos 2:21; 4:16;
2. Dhisitaanka
 - a. Walaalka taagta yar, Rooma 15:1
 - b. Jaarka, Rooma 15:2
 - c. Midba midka kale, Efesos 4:29; I Tesaloniika 5:11
 - d. Adeegayaasha, Efesos 4:11
3. Waxaan wax ku dhisaynaa
 - a. Jacayl, I Korintos 8:1; Efesos 4:16
 - b. Xadidista xorriyadaha shakhsi ahaaneed, I Korintos 10:23-24
 - c. Ka fogaanshaha xanta, I Timoteyos 1:4
 - d. Xadidista kuwa ka hadlaya adeegyada caabudista (heesayaasha, macallimiinta, nebiyada, kuwa ku hadla carrabada kala duwan, iyo tarjumaannada), I Korintos 14:3-4,12.
4. Wax kasta waa inay dhisaan
 - a. Amarrada Bawlos, 2 Korintos 10:8; 12:19; 13:10

▣ **“oo dhaxal idinka dhex siiyo”** Axdiga Hore dhexdiisa Ilaah ayaa dhaxalsiin jiray Laawiyiinta iyo Wadaadada. Axdiga Cusub dhexdiisana Ilaah waxa uu dhaxalsiinayaa rumaystaasha oo dhan, maxaa yeelay rumaystayaashu waa carruurta Ilaah iyagoo sidaasna ku helay shakhsiga iyo shaqada Masiixa (cf. Rooma. 8:15,17; Galatiya. 4:1-7; Kolosay. 1:12).

Rumaystayaasha Axdiga Cusubi sidii Israa’iiliyiinta Axdiga Hore, waxa weeyi wadaado (cf. I Butros. 2:5,9; Muujintii. 1:6). Waxa la inaga rabaa inaan ka dhex adeegno dunida luntay.

▣ **“kuwa qodus laga dhigay oo dhan”** Waa fal dhammaystiran oo mafcuulku soo horreeyo. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Quduusnaanta 9:32.

20:33 “lacagtiis, ama dahabkiis,” Waxa ay ahaayeen labo wax oo tusinaya hodantinimada. Bawlos waxa uu difaacayaa wax qabadkiisa iyo ujeedooyinkiisa. Axdiga Cusub dhexdiisa guubaabada damaca iyo sinadu waxay calaamad u yihiin macallimiinta beenta ah (cf. I Korintos. 3:10-17).

20:34 “adeegeen waxaannu u baahnayn aniga” Bawlos wuxuu diiday caawimaadaha ka ahaaday kaniisadaha uu hadda ka adeegay sababtuna waxay ahayd eedayn kaga timid dhinaca macallimiinta beenta ah. Bawlos isaga ayaa naftiisa taageerayay (cf. I Korintos. 4:12; 9:3-7; II Korintos. 11:7-12; 12:13; I Tesaloniika. 2:9; II Tesaloniika. 3:6-13). Sidoo kale Bawlos waxbaristiisa rabbaaniga ahayd ee hore aawadeed muu oggolayn inuu waxbarista ku qaato lacag. Si kastaba ha ahaatee waxa uu sheegayaa kuwa u adeega injiilka in wax la siiyo (cf. I Korintos. 9:3-18; I Timoteyos. 5:17-18).

Waxa jirta taariikh kooban oo ku saabsan dunidii bariga dhexe ee qarnigii koobaad oo uu qorayo James S. Jeffers, *The Greco-Roman World of the New Testament Era*. Waxa ay sheegaysaa Bawlos oo gacmihiisa ku shaqaysan jiray si uu u daboolo baahidiisa jidh ahaaneed dhammaanba saddexdiisii socdaal ee adeegitaanka ahaa (cf. p. 28).

1. Safarkii koobaad, I Korintos. 4:12; 9:6; I Tesaloniika. 2:9
2. Safarkii labaad, Fal 18:3
3. Safarkii saddexaad, Fal 19:11-12; 20:34; II Korintos. 12:14

20:35 Fiiro u yeelo in rumaystayaashu aanay shaqaale u ahayn shakhsiyadooda oo keliya, balse kuwa u baahan magaca Masiixa (cf. II Korintos. 9:8-11). Xigashada Bawlos ee ka ahaatay Ciise kuma sugna injiillada oo dhan. Sidaas darteed waxay ahayd baa laga yaabaa dhaqan afka la isugu sheego.

Kuwan “itaalka yar” halkan looguma isticmaalin iyadoo looga jeedo Masiixiyiinta xagga ruuxa ku itaalka daran (cf. Room. 14:1; 15:1; I Korintos. 8:9-13; 9:22), laakiin waa kuwa jidh ahaan baahan. Bawlos wuxuu u shaqaynayay inuu naftiisa iyo kuwa kale ee baahanba taageero.

NASB (UPDATED) TEXT: 20:36-38

³⁶Markuu waxaas ku hadlay dabadeed ayuu jilba joogsaday oo la tukaday dhammaantood. ³⁷Markaasay kulligood aad u wada ooyeen, oo Bawlos qoorta kaga dhaceen oo dhunkadeen, ³⁸iyagoo sida badan ka caloolxun hadalkuu ku hadlay oo ahaa inayan mar dambe wejigiisa arki doonin. Markaasay sii ambabixiyeen isagii ilaa doonnidii.

20:36 “jilba joogsaday” May ahayn caado tukasho ah oo la xidhiidha Bawlos oo asalkiisu Yuhuudi yahay, balse waxay ahayd waajib gaara daraaddis (cf. aayadda. 32; 21:5).

20:37 “oo Bawlos qoorta kaga dhaceen o” NKJV waxa uu dhigayaa, “Bawlos qoorta kaga dhaceen.” Ilaah baa mahad ku leh hoggaamiyayaasha kaniisadaha ee uu inoo keenay aawadood si ay inoo caawiyaan.

20:38 “ka caloolxun hadalkuu ku hadlay” Middani waxay weeyi sida ku sugan aayadda. 25.

SU'AALO FALQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu Bawlos ula socdaalayey niman badan oo ka kala socda magaaloooyin badan sida ku sugan aayadda 4?
2. Waa maxay ujeedada fiqi ahaaneed ee aayadaha. 7-10?
3. Maxay aayadda 13 u tahay mid lagu wareerayo?
4. Muxuu Bawlos naftiisa ugu hor difaacay waayeelladii Efesos?
5. Muxuu Bawlos u tegayay Yerusaaalem haddii nebiyadu usii sheegin cawaaqibka kaga iman doono haddii uu booqdo? (aayadaha. 22-23)
6. Nebiyada beenta ahi maxay casri kasta iyo meel kasta uga jiraan? Ma yihiin kuwo badbaaday? Kuwa iyaga raaca se ma badbaadeen? Waa maxay nebiga beenta ahi?
7. Maxay aayadaha 36-38 inoogu sababayaan inaan jeclaanno oo u ducayno hoggaamiyayaasheenna?

FALIMAHA RASUULLADA 21

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos oo u safray Yerusaaalem	Uga degitaanka u safridda Yerusaaalem	Bawlos wuxu ku laabtay Falastiin (20:7-21:14)	Bawlos wuxu tegayaa Yerusaaalem	U safritaankii Yerusaaalem
21:1-6	21:1-14	21:1-6	21:1-6	21:1-6
21:7-14		21:7-14	21:7-11 21:12-13	21:7-14
	Bawlos wuxu sheegay inuu nabad samayn doono	Bawlos oo waafaqsanaa Yuhuudda	21:14	Bawlos oo yimid Yerusaaalem
21:15-16	21:15-25	21:15-16	21:15-16	21:15-16
Bawlos oo booqanaya Yacquub			Bawlos oo booqanaya Yacquub	
21:17-26		21:17-26	21:17-25	21:17-25
	Ku xidhistii Macbadka			
	21:26-36		21:26	21:26
Bawlos waxa lagu xidhay Macbadka		Bawlos xidhistiisii iyo is difaacii	Bawlos waxa lagu xidhay Macbadka	Xidhitaankii Bawlos
21:27-36		(21:27-22:29) 21:27-36	21:27-29 21:30-36	21:27-29 21:30-36
		21:37-40		
Bawlos oo is difaacaya	La hadlitaankaa ururkii Yerusaaalem		Bawlos oo is difaacaya	
21:37-22:5	(21:37-22:21)		(21:37-22:5) 21:37a 21:37b-38 21:39	21:37-40

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

Cutubkani waxa uu ka yaaban yahay waxa aan la odhan! Lama sheegin Bawlos oo kaniisadaha kuwa aan Yuhuudda ahayn ka dalbaday inay tabarrucaad usoo ururiyaan kaniisadda Yeruusaalem.

James D. G. Dunn, *Unity and Diversity in the NT*, pp. 272-278, ayaa waxa uu sheegayaa walaac dhex yaallay Yacquub (waxa lagu yaqaanay u janjeedhitaankiisa dhaqanka Yuhuudda) iyo Bawlos oo ku saabsanaa dhaqanka nolosha Yuhuudda rumaysadka leh.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 21:1-6

¹Oo waxaa dhacday, markaannu iyagii ka tagnay oo dhoofnay dabadeed, inaannu toos u nimid Koos, maalintii dambena waxaannu nimid Rodos, meeshaasna waxaannu ka aadnay Batara; ²oo markaannu helnay doonni Foynike u sii dhaafaysa ayaannu fuulnay oo ku dhoofnay. ³Oo kolkii Qubrus noo muuqatay, ayaannu dhinaca bidixda ka marnay oo u dhoofnay Suuriya, oo waxaannu ku degnay Turos, maxaa yeelay. meeshaasaa doonnidu shixnaddeedii ku dejin lahayd. ⁴Oo markaannu xertii ka helnay, ayaannu meeshaas joognay toddoba maalmood; oo kuwaasu waxay Ruuxa ugu sheegeen Bawlos inaanu Yeruusaalem cag saarin. ⁵Oo markii maalmahaasu noo dhammaadeen ayaannu ka tagnay oo sii soconnay; oo dhammaantood, iyaga iyo dumarkoodii iyo carruurtoodiiba, ayay na sii ambabixiyeen ilaa magaalada dibaddeeda; markaasaannu xeebta ku jilba joogsannay oo tukannay, ⁶oo isnabad gelinay; kolkaasaannu doonnidii fuulnay. iyaguse guryahoodii bay ku noqdeen.

21:1 “toos u nimid” Waa erey loo adeegsado meel toos loogusoo shiraacdo (16:11). Luukos waxa uu yaqaanay ereyada loo isticmaalo doonyaha (aayadda 3). Badanaa qaybaha ay ku jirto “anagu” waxay koobsanaysaa shiraacasho.

▣ **“Koos”** Magacani waxa uu la macno yahay “cidhif.” Waxa weeyi magaca jasiiradda iyo magaalada ugu wayn. Jasiiraddani waxay ahayd gurigii Hippocrates (qarnigii shanaad C.H.) waxaanay ahayd meel uu ku yaallo

dugsi lagu barto caafimaadku. Waxay ahayd magaalo xora oo ka gaar ah gobolkii Roomaanka ee Aasiya. Waxay ay konton mayl dhinaca koonfureed kaga beegnayd Miletus.

▣ **“Rodos”** Waxay ahayd magaca jasiirad iyo magaalada caasimadda ah. Jasiiraddan ganacasi waxay caan ku ahayd (1) uduggeeda iyo (2) aqoonteeda, taasi oo gaar u ahad cod karnimada. Wakhtigii hore (29 C.H.) waxay caan ku ahayd naxaas taallo ah oo dhererkeedu yahay 104 isla markaasna ahaa nin taagan dekedda. Waxay u shaqayn jirtay sidii guri iftiin.

▣ **“Batara”** qoraal gacmeedka Giriigga ee galbeedka (P⁴¹, D) iyo kuwo ka mida Laatiinka Qadiimiga ah ayaa raacinaya “iyo Mayra” (waxay u eegtahay ku darid ka ahaatay 27:5), oo ahaa dekada doomaha ugu wayn ee Suuriya. UBS⁴ waxa uu ku bixinayaa akhrin gaaban “A” (hubaal).

Batara waxay ahayd magaalada xeebta ku taalla ee Lusiya. Waxay caan ku ahayd waxsii sheegidda Abollo kaaso wakhti la mid ahaa Delfi.

21:2 “oo markaannu helnay doonni Foynike u sii dhaafaysa” Waxa uu ahaa doon wayn. Doomaha yaryari waxay ku koobnaan jireen xeebta. Doontani marar badan ayay ku badbaadisay inay jihada saxda ah u qaaddo.

21:3 “Oo kolkii Qubrus noo muuqatay” Waxa laga yaabaa inay keentay ka fikiritaanka Barnabas iyo safarkii adeegitaanka ee koobaad.

▣ **“Turos”** Waxay ahayd caasimad xeebeedka Foynike.

21:4 “xertii” Waxa magaaladan ku taallay kaniisad taasi oo bilaabantay kaddib silcintii Istefanos (cf. 8:4; 11:19). Wakhtigan rumaystayaashu waxay raadinayeen rumaystayaal kale oo ay la joogaan (cf. aayadaha. 7,16).

▣ **“Ruuxa ugu sheegeen Bawlos inaanu Yerusaaalem cag saarin”** Tani waxay sheegaysaa iyada oo ururkan dhexdiisa ay jooheen nebiyo (cf. 20:23; 21:10-12). Ka fikiritaankooda silcintu waxay ahayd run hase ahaatee Bawlos safarkiisuna waxa uu ahaa doonista Ilaah (cf. aayadda. 14). Ciise isagoo adeegsanaya Ananiyas ayuu Bawlos u sheegay wax ku saabsan shaqada noloshiisa (cf. Fal 9:15-16). Silcitaanku waxa uu noqonayaa qayb ka mid ah, laakiinse waa inuu u marag furo boqorro.

21:5 “markaasaannu xeebta ku jilba joogsannay oo tukannay,” Kani waa sawir qurxoon oo ah is danaynta iyo jacaylka Masiixiyadda. Waxa laga yaabaa inay ahayd adeeg gaar ah sida 20:32,36.

NASB (UPDATED) TEXT: 21:7-14

⁷Oo markii dhoofkii aannu Turos ka soo dhoofnay noo dhammaaday, waxaannu nimid Botolemays; markaasaannu walaalihii soo salaannay oo maalin la joognay iyagii. ⁸Maalintii dambena waannu ka tagtay, oo waxaannu nimid Kaysariya; markaasaannu galnay gurigii Filibos oo ahaa kii wax wacdiyi jiray oo toddobadii ka mid ahaa, oo isagaannu la joognay. ⁹Ninkanu wuxuu lahaa afar gabdhood oo bikrado ah oo wax sheegi jiray. ¹⁰Kolkaannu maalmo badan meeshaas joognay, waxaa Yahuudiya ka yimid nebi la odhan jiray Agabos. ¹¹Oo markuu noo yimid ayuu qaatay Bawlos dhex-xidhkiisii oo ku xidhxidhay gacmihiisii iyo caghiisii isagoo leh, Ruuxa Qoduuska ahu sidaasuu leeyahay, Yuhuudda Yerusaaalem joogtaa sidaasay u xidhi doonaan ninka dhex-xidhkan leh, oo waxay isagii u gacan gelin doonaan dadka aan Yuhuudda ahayn ¹²Annaga iyo kuwii meeshaas joogayba, markaannu waxyaalahaas maqalnay, waxaannu isagii ka barinnay inuusan 'Yerusaaalem tegin. ¹³Markaasaa Bawlos u jawaabay oo ku yidhi, Maxaad samaynaysaan oo aad u ooyaysaan oo ii qalbi jebinaysaan? maxaa yeelay, diyaar uma ihi inaan xidhnaado oo keliya, laakiinse waxaan u diyaarahay inaan Yerusaaalem ku dhinto magaca Rabbi Ciise aawadiis. ¹⁴Oo markii la yeelsiin waayay, waannu iska daynay, oo waxaannu nidhi, Rabbiga doonistiisu ha noqoto.

21:7 “Botolemays” Magaaladan waxa magaca loo bixiyay Iksanadarkii Waynaa ee xukumay Masar dabadiis, waxaana dhisay Bolotemayas II sanadkii 26 C.H. waxa weeyi dekedda keliya ee xeebta Falastiiniyiinta. Axdiga Hore dhexdiisa waxa loogu yeedhay Ako (Xaakinnadii 1:31). Maantana waxa lagu magacaabaa magaceeda Saliibiga ah ee Akre.

▣ **“walaalihii”** Falimaha Rasuullada dhexdiisa middani waxay la mid tahay “xer” (cf. aayadaha. 4,16). Waxa loogu magac daray kuwa raaca Ciise Masiix.

▣ **“la joognay iyagii”** eeg sharraxa aayadda 4.

21:8 “waannu ka tagnay” inay dhulka mareen iyo inay badda mareen lama hubo.

▣ **“Kaysariya”** Waxay ahayd xarunta maamulka Roomaanka ee Falastiin. Waxay ahayd magaalo xeebta ku taalla oo lahayd dekad yar. Waxa halkaas ku noolaa Filibos (cf. 8:40).

▣ **“kii wax wacdiyi jiray”** Weedhan si la yaab leh ayaa loogu dhex adeegsaday Axdiga Cusub saddex jeer (cf. Efesos. 4:11 iyo II Timoteyos. 4:5). Ma hubno hadiyaddan adeeg ee uu lahaa. laakiin ereygu waxa uu tusinayaa macnaha ah “qof injiilku ku wacdiya.

▣ **“oo toddobadii ka mid ahaa”** Tani waxa ay sheegaysaa dhibaataadii kaniisaddii Yerusaaalem oo wax ku canaanaysay caddaalad darrada cunto qaybinta carmalka ku hadlayay afka Giriigga. Kaniisaddu waxay dooratay toddobo nin si ay baahidan u daboolaan. Dhammaantoodna waxay lahaayeen magacyo Giriig ah. toddobadani waxay ahaayeen wacdiyayaal xooggan, waxaanay ahaayeen kuwii u horreeyay ee loo qabto aragtida caalamiga ah ee injiilka (Fal 6).

21:9 “wuxuu lahaa afa gabdhood oo bikrado ah oo wax sheegi jiray.” Xasusnow in Luukos uu si gaara u danaynayay dumarka. Waxa aan u baahnay inaan dib uga fikirno aragtideenna ku waajahan dumarka iyo hoggaamintooda (cf. Yoo`eel 2:28-32; Fal 2:16-21) kaniisadda dhexdeeda ee lagu salaynayo cadaymaha Axdiga Cusub ku sugan. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Dumarka ku sugan Kiraabka 2:17. Kitaab arrintan iga caawiyay ayaa waxa uu yahay Gordon Fee, *Gospel and Spirit*.

Dhaqan kaniisadeed ayaa waxa uu leeyahay waxay tegeen Aasiyada Yar (Phrygia) iyadoo gabdhihiisuna ay in badan noolaayeen oo Ilaah ay ugu adeegeen ilaa gabow ay ka gaadheen. Dhaqankan waxa aan ka baranaynaa Eusebius xigashadiisa ka ahaatay Polycrates iyo Papias (cf. *Eccl. Hist.* 3:31:2-5).

21:10 “nebi la odhan jiray Agabos” Waxa jirta ugu yaraan labo siyaabood oo loo fahmi karo middan.

1. Warqadaha Korintos dhexdooda waxay loogala jeedaa ku wacdinta injiilka (cf. I Korintos. 14:1)
2. kitaabka Falimaha Rasuulladu waxa uu sheegayaa nebiyo (cf. 11:27-28; 13:1; 15:32; 21:10, iyo xitaa dumar nebiyado ah, 21:9)

Dhibaataada ereygani waxa weeyi, sidee hadiyadda nebinimada ee Axdiga Cusubi ula xidhiidhaa nebinimada Axdiga Hore? Axdiga Hore dhexdiisa, nebiyadu waxa weeyi qorayaasha Qorniinka. Axdiga Cusub dhexdiisa shaqadan waxa la siiyay asal ahaan Labo iyo Tobanka Rasuul iyo kalkaaliyayaashooda. Sida ereyga “rasuul” waxa la sheegay inuu yahay hadiyada soconaysaa (Efesos 4:11), laakiin waxa uu wataa shaqo kaduwan kaddib dhimashadii Labo iyo Tobanka. Waxyigu (eeg Mawduuca Gaarka ah 13:1) wuu istaagay; ma jiro Qorniin dheeraada oo waxyi ahi (Yuudas aayadda 20). Nebiyada Axdiga Cusub shaqadooda ugu muhiimsani waa faafinta injiilka, laakiin sidoo kale sida xaqiiqooyinka Axdiga Cusub ee hadda waa in la muujiyo. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Waxsii sheegidda Axdiga Cusub 11:27.

21:11 Agabos, sida nebiyada Axdiga Hore ee Yeremyaah iyo Yexesqeel waxa uu ku dhaqmay muujintiisa.

21:12 “isagoo leh,” Waa fal aan dhammays tirnayn oo wax tusmaynaya. Waxa loogala jeedi karaa (1) bilaabitaanka fal ama (2) kusoo celcelinta fal wakhti hore ahaa.

21:13 Waxa adag isu dheelli tirka falkan waxsii sheegidda ah iyo Bawlos oo doonista Ilaah aawadeed Yerusaaalem ugu socday (cf. aayadda.4).

▣ “**magaca Rabbi Ciise aawadiis**” Eeg Mawduuca Gaarka ah: Magaca Rabbiga 2:21.

21:14 “Rabbiga doonistiisu ha noqoto.” Waa fal amar ah oo wakhti xaadirka jooga, oo loo adeegsaday macno duco. Ilaah waxa uu qorshe iyo ujeedaba ka leeyahay nolosha Bawlos. Waxa uu Bawlos ogsoonaa doonistaa Ilaah xitaa haddii ay jiraan waxsii sheegyo ku saabsan dhibaatooyin soo food saari doona. Waxa uu dareemay in waxsii sheegyadani ay u ahaayeen ruuxiisa iyo u diyaar garoobitaanka caqli ahaaneed balse aanay ahayn mamnuucitaan.

MAWDUUC GAAR AH: DOONISTA (thelema) ILAAH

INJIILKA YOOXANAA

- Ciise wuxuu u yimid in uu fuliyo doonista Aabbaha (cf. 4:34; 5:30; 6:38)
- In maalinta ugu dambaysa ay ku kacaan kuwa Aabbuhu siiyey wiilka (cf. 6:39)
- In dadka oo dhan ay rumeeyaan Wiilka (cf. 6:29,40)
- Salaadaha laga soo jawaabo oo la xidhiidha samaynta doonista Ilaah (cf. 9:31 iyo I Yooxanaa 5:14)

ARAGTIDA AY INJIILLADA KALE KA SIMAN YIHIIN

- Samaynta Ilaah doonistiisu waa lagama maarmaan (cf. Matayos 7:21)
- Samaynta doonista Ilaah waxa ay dadka ku walaalaysaa Ciise Masiix (cf. Matayos 12:50; Markos 3:35)
- In qof uu dhintoba ma aha doonista Ilaah (cf. Matayos 18:14; I Timoteyos 2:4; II Butros 3:9)
- In Ciise Masiix uu Golgota ku dhinto waxa ay ahayd doonista Aabbaha (cf. Matayos. 26:42; Luukos 22:42).

BAWLOS WARQADIHIISI

- Qaan gaadhnimada iyo adeegga rumaystayaasha dhamaantood (cf. Rooma 12:1-2)
- Runaystayaasha oo laga soo waday facii sharka (cf. Galatiya 1:4)
- Doonista Ilaah waxa ay ahayd qorshihiiisii soo madax furashada (cf. Efesos 1:5,9,11)
- Rumaystayaasha oo maraya kuna noolaanaya nolol uu Ruuxu hoggaaminayo (cf. Efesos 5:17-18)
- Rumaystayaasha oo ay aqoonta Ilaah ka buuxsantay (cf. Kolosay 1:9)
- Rumaystayaasha oo laga dhigay kuwo buuxa oo kaamil ah (cf. Kolosay 4:12)
- Rumaystayaasha oo qudduus laga dhigay (I Tesaloniika 4:3)
- Rumaystayaasha oo shay kasta ka mahad naqaya (cf. Tesaloniika 5:18)

BUTROS WARQADIHIISII

- Rumaystayaasha oo xaq samaynaya (i.e., u hoggaansamaya xukuumadaha) oo isla markaa ka aammusaya raga nacasiinta ah (cf. I Butros 2:15)
- Rumaystayaasha oo silcaya (cf. I Butros 3:17; 4:19)
- Rumaystayaasha oo aan ku noolayn nolol ay ay naftu udub dhexaad u tahay (cf. I Butros 4:2)

YOOXANAA WARQADIHIISII

- Rumaystayaasha ku jiriddooda weligeed ah (cf. I Yooxanaa 2:17)
- Waxa furaha u ahaa rumaystayaasha ducooyinkooda laga jawaabay (cf. I Yooxanaa 5:14)

NASB (UPDATED) TEXT: 21:15-16

¹⁵Maalmahaas dabadeedna, alaabtayadii baannu diyaarsannay, oo waxaannu tagnay Yerusaaalem.

¹⁶Oo waxaa na raacay qaar ka mid ahaa xerta Kaysariya iyagoo wada mid Manasoon la odhan jiray oo reer Qubrus ahaa oo xertii hore ka mid ahaa, kaasoo aannu u hoyan lahayn

21:15 “alaabtayadii baannu diyaarsannay” King James Version waxa uu dhigayaa “alaabtayadii baannu diyaarsanay” (NKJV “alaabaysanay”). Waxa ereygan loo adeegsaday u diyaar garoobista socdaalka, Axdigaga cusub dhexdiisana halkan oo keliya ayaa lagaga isticmaalay.

▣ “Yeruusaalem” waxay ka fogayd ku dhowaad 64 mayl.

21:16 “Manasoon” Waxay aahaayeen Masiixiyiin Yuhuud ah oo ka socday Qubrus (sida Barnabas). Waxa uu kamid ahaa Yuhuuddii Giriigga ahaa, sida Toddobada ku sugan Fal 6. Waxa uu Masiixi noqday wakhti hore, waxaana suurto gal ah in Luukos marka uu Injiilkiisa qorayay inuu ku dhex wareystay Falstiin markii Bawlos lagu xidhay Kaysariya.

FAHANKA MACNAHA GUUD EE FALIMAHA RASUULLADA 21:17-23:30

A. GUUDMARKA KOOBAN EE FAL 21:17-26:32 (xidhitaankii iyo is difaacistii Bawlos ee Yeruusaalem iyo Kaysariya.)

- | | |
|--|-------------|
| 1. kacdoon iyo ku dhex xidhista Macbadka | 21:17-40 |
| 2. Bawlos oo dadka isku hor difaacay | 22:1-22 |
| 3. Su’aalitaankii Roomaanka | 22:23-30 |
| 4. Su’aalitaankii Senhadriinka | 23:1-10 |
| 5. qorshayntii in la dilo Bawlos | 23:11-35 |
| 6. Bawlos oo la horgeeyay Felix | 24:1-23 |
| 7. Bawlos oo si gaara loo horgeeyay Felix Drucilla | 24:24-27 |
| 8. Bawlos oo la horgeeyay Festus | 25:1-12 |
| 9. Bawlos oo la horgeeyay Agrippa II Bernice | 25:13-26:32 |

A. WAXYAALAHA SALDHIGA U AH IS DIFAACISTA BAWLOS

Waxyaalaha ay wadaagaan	Bawlos oo ururka horjooga	Bawlos oo horjooga Senhadriinka	Bawlos oo horjooga Felix	Bawlos oo horjooga Festus iyo Agrippa II
1. asalkiisa Yuhuudiga ah	22:3		24:14,17-18	26:4
2. tababarkiisa Farriisiga ah	22:3	23:6-9	24:15,21	26:5-8
3. silcintiisii jidka	22:4-5			26:9-11
4. markhaatifurkiisii shakhsi ahaaneed	22:6-16			26:12-16
5. Ilaah oo ugu yeedhay adeeg	22:17-22			26:17-23

C. ISBARBARDHIGISTA SIDUKIYIINTA IYO FARRISIINTA

Asalka	<u>SIDUKIYIIN</u>	<u>FARRISIYIIN</u>
Magaca macnihiisa	Wakhtigii Makabiyanka	Wakhtigii Makabiyanka
Xaaladda bulsho ahaaneed	“Sidukiyiin”?	“Kuwa Soocan”?
Su’aasha ruuxiga ah	Wadaaddo	Dabaqada Dhexe rag ah
	Sharciga qoran oo keliya (gaar ahaan Bilowgii ilaa Sharciga Kunoqshadiisa)	Dhammaanba sharciga qoran iyo nebiyada iyo qoraallada kale ee
	Xagjir	Axdiga Hore
Fiqiga		Horumar

-kasoo horjeeda Farrisiinta lagu eedeeyay inay ay sameeyeen Zoroastrianism ku (23:8)

-heer sarreeya
-rumaysnaayeen dhimashada iyo sarakicista
-nolol maalmeedka u raaca sharciyo

NASB (UPDATED) TEXT: 21:17-26

¹⁷Markaannu Yerusaaalem nimidna walaalihii farxad bay nagu soo dhoweeyeen Bawlos wuxuu isku deyey inuu Masiixiyiintii Yuhuudda ahayd la heshiiyo ¹⁸Maalintii ku xigtayna Bawlos oo nala socda ayaannu waxaannu u tagnay Yacquub; waayeelladii oo dhammuna way joogeen. ¹⁹Markuu iyagii salaamay dabadeedna, mid mid buu ugu sheegay waxyaalihii Ilaah dadka aan Yuhuudda ahayn dhexdooda kaga sameeyey shuqulkiisa. ²⁰Iyaguna, kolkay taas maqleen, ayay Ilaah ammaaneen: oo waxay ku yidhaahdeen isagii, Walaalow. waad aragtaa intay yihiin kumanyaalka rumaystay oo Yuhuudda ku dhex jira; kulligoodna sharcigay ku kulul yihiin. ²¹Iyagana waa loo sheegay wax kugu saabsan inaad Yuhuudda quruumaha ku dhex jirta bartid inay Muuse ka tagaan adigoo u sheegaya inaanay carruurtooda gudin oo aanay caadooyinka ku socon. ²²Haddaba waa maxay? Way wada maqli doonaan inaad timid. ²³Sidaas darteed waxaannu kuu sheegayno yeel. Waxaa nala jooga afar nin oo nidar galay; ²⁴kuwaas kaxee oo isla daahiri oo kharashka iyaga ka bixi inay madaxa xiirtaan; markaasay dhammaan w axay wada ogaan doonaan inaanay waxba ahayn waxyaalihii lagaa sheegay, laakiin inaad adiga qudhaadu si hagaagsan u socotid oo aad sharciga dhawrtid. ²⁵laakiin wax ku saabsan dadkii aan Yuhuudda ahayn oo rumaystay ayaannu qornay, annagoo ku amrayna inay iska ilaaliyaan waxa sanamyada loo sadqeeyo, iyo dhiigga, iyo waxa la ceejiyo, iyo sinada. ²⁶Markaasaa Bawlos nimankii kaxeeyey, oo maalintii dambena intuu iyagii isla daahiriyeey ayuu macbudka galay, isagoo caddaynaya maalmihii isdaahirinta dhammaadkoodii. ilaa intii sadaqada loo sadaqeeyey mid kasta oo iyagii ka mid ahaa.

21:17 Waxa calaamad wanaagsan ahayd in rumaystayaasha kaniisadda Yerusaaalem ay Bawlos iyo kuwan aan Yuhuudda ahayn siiyeen soo dhowayn qalbi ah (cf. Luukos 8:40; 9:11; Fal 2:41; 18:27; 21:17; 24:3; 28:30), laakiinse arrimo ayaa ka dhex jiray kaniisadda Yerusaaalem (aayadaha 20-21).

21:18-19 “**Bawlos oo nala socda ayaannu waxaannu u tagnay Yacquub**” Halkan laguma sheegin hadiyadda ka ahaatay kaniisadda kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. 24:17). Bawlos waxa uu warbixin la mida Yacquub ku siiyay sida ku sugan 15:12. Yacquub waxa uu ahaa Ciise walaalkiis waxaanu ahaa hoggaamiye laga tix geliyo kaniisadda Yerusaaalem (cf. Fal 12:17; 15:13).

21:18 “**waayeelladii oo dhammuna way joogeen.**” Fiiro u yeelo in halkan aan lagu sheegin Rasuullada. Waxa laga yaabaa inay socdaal ku jireen ama in ay ahaayeen kuwo dhintay. Adeegsigaa ereyga “waayeel” waxa halkan ay ku tusinaysaa isticmaalka Yuhuudda (cf. 4:5,8,23; 6:12; 11:30; 15:2,4,6,22,23; 16:4; 23:14; 24:1,25; 25:15; Cibraaniyada. 11:2; Yacquub 5:14), adeegsigeeda danbe looma adeegsanin rasuullada (cf. 14:23; 20:17,18,23; I Timoteyos. 5:17,19; Tiitos 1:5; I Butros. 5:1; II Yooxanaa 1; III Yooxanaa 1).

21:19 Kuwo ka mid ah mufasiriinta ayaa u malaynaya in Bawlos uu helay soo dhowayn iyo in aan lacagtii ka socotay kaniisadda kuwa aan Yuhuudda ahayn aan la aqbalin. Wax yaalaha lagu sababaynayaana waa sidan.

1. Bawlos waxa uu joogay dhulka Giriigga, kamanuu mid ahayn hoggaamiyayaashii kaniisadda Yareesaalem.
2. Lama sheegin hadiyadda oo la sharfay.
3. Hoggaanku waxa uu markaba Bawlos u sheegayaa sida aanay u jeclaysanin kumaankun Yuhuuda oo ku sugnaa kaniisadda Yareesaalem.
4. Lama sheegin kaniisadda oo Bawlos taageertay intuu ku jiray xabsiga ama markii la maxkamadaynayay.

Waa in la sheego in uu jiray khilaaf ku saabsan farriinta Bawlos iyo adeeggiisa. Si kastaba ha noqotee, aayadda 19 waxay iila muuqataa aniga dhinaca wanaagsan!

21:20 “**intay yihiin kumanyaalka rumaystay oo Yuhuudda ku dhex jira**” Waa markhaati fur wanaagsan oo ku saabsan awoodda injiilka iyo Ilaah oo jecel dadka Ilaah ee ah Yuhuudda ku sugan Yerusaaalem. Waxa jiray rumaystayaal Yuhuud ah. waxa laga yaabaa in Sekeryaah 12:10 la dhammays tiray.

▣ **“rumaystay”** Waa fal dhammaystiran oo mafcuulku soo horreeyo (eeg Mawduuca Gaarka ah 3:16 iyo 6:5). Tani waxa ay ka tarjumaysaa badbaado runa oo ah iimaan. Qofku waxa uu badbaadi karaa isaga oon si buuxda wax u fahmin iyadoo uu jiro fahan qaldan oo la xidhiidha arrimaha fiqi ahaaneed (cf. Fal 1:6; Luukos 19:11).

Bawlos waxa uu kuwan ku sheegaya Masiixiyiin “taagdaran” (cf. Rooma. 14:1-15:13; I Cor. 8; 10:23-33). Waxa uu rabaa in uu iyaga dhiirri geliyo iyadoo taagdarradoodu aanay saamayn ku yeelanaynin injiilka (Yuhuudda reer Galatiya).

▣ **“kulligoodna sharcigay ku kulul yihiin”** Tani waxay tusinaysaa tiro badan oo ah Farrisiin noqday Masiixiyiin. Si kastaba ha ahaatee, rumaysad yeelashadoodu kama saarayso dhaqankoodii diin ahaan ay haysteen. Waxa ay la mid ahaayeen Yuhuuddii reer Galatiya. Waxa la yaab leh sida Bawlos uu u jeclaana una taageeraya rumaystayaashii “taagta darraa” laakiinse raalli kamuu ahayn macallimiinta beenta ah ama kuwa sida beenta ah injiilka uga hadlayay.

21:21 “Iyagana waa loo sheegay wax kugu saabsan inaad Yuhuudda quruumaha ku dhex jirta bartid inay Muuse ka tagaan” Weedha ah “loo sheegay” waxa ay ka tarjumaysaa cibaarada Cibraaniga ah “re-echo,” oo tusinaya waxbaris afka ah. waxa middan la xidhiidha fal wakhti xaadirka jooga (bartid) iyadoo tusinaysa in Yuhuuddii ku sugnayd Yerusaaalem ay marar badan Bawlos arrintan kala hadlayeen. Xukunku waxa uu ahaa mid ku saabsan wacdinta kuwa aan Yuhuudda ahayn iyada oo sababay dhibaato badan (Fal 15).

Ereyga “ka tagaan” waa erey xooggan oo Ingiriisida ugu imanaya (cf. II Tesaloniika. 2:3). Arrinta fiqi ahaaneed waxa ay la xidhiidhaa sida Yuhuuddu xidhiidhka ay la leeyihiin Axdiga Hore weli aanu ahayn mid salka dhigay. Macnoyaasha qaarkood waxa ay ka tarjumaysaa arrimaha “sunagogyada Messeyaaniga ah”!

21:23 “Waxaa nala jooga afar nin oo nidar galay” Kuwani waxay ahaayeen xubnaha kaniisadda. Waxa ay tilmaamaysaa nidar xadidan oo ah Nazarite (cf. Tirintii. 6:1-8). Bawlos waxa uu mar hore qaatay nidar la mid ah (18:18). Waxa aynaan aad u hubin faahfaahinta ku saabsan nidarka gaarka ah (cf. *Nazir* 1:3).

21:23-25 Waxa ay middani fahan inaga siinaysaa aragtida Bawlos uu ka qabay Masiixiyiintu xidhiidhka ay la leeyihiin Sharciga Muuse. Bawlos waxa laga yaabaa inuu si joogto ah u indho indhaynayay dhaqamada Yuhuudda (cf. 18:18; 20:6), ugu yaraan marka uu iyaga wacdinayo (cf. I Korintos. 9:19-23). Tani waxa ay xoojinaysaa Yuhuudda Masiixa sugaya maalmehennan.

21:24 “oo kharashka iyaga ka bixi” Bawlos waxa laga yaabaa in aanu qaadanin nidar Nazarite ah, laakiin uu dhiibay waaq dhaca laga rabo kuwan kale. rabbaaniyuuntu waxay aamminsanaayeen in ay sharaf tahay haddii nidarka Naziratiga wax laga dhiibo (*Ned.* 10a).

MAWDUUC GAAR AH: NIDARKA NAZARITE KA

- A. Tani waxay ahayd si uu qof dumara ama naag ahi (Tirintii 6:1), oo aan ka mid ahayn qabiilka Laawiyiintu uu Ilaah dartiis nidar ugu galayay adeegitaan (“quduus ugu ahaado Rabbiga”). Nazarite waxa macnihiisu yahay “mid soocmay” (BDB 634), oo asal u ah fikirka Cibraaniga ah ee la xidhiidha quduus.
- B. Axdiga Hore dhexdiisa waxay ahayd nidar wakhti dheer ah
 1. Samson (Xaakinnadii. 13:7)
 2. Samu’eel (I Samu’eel. 1:21)
 3. Yooxanaa Baabtiisaha
- C. Yuhuuddu wakhti gaabay ayay ka qaateen nidarka Nazarite ka (waxa laga yaabaa inuu ka yimid ereyada ku sugan Tirintii 6:5). Mudada ugu gaabani waxay ahayd saddex cisho. Nidaarkan wakhtiga gaaban ahi waxa uu ku furmayay xiiritaanka madaxa iyo in waaq dhac lagu sameeyo macbadka.
- D. Waxyaalaha gaarka ah ee la rabo (cf. Tirintii. 6:1-8)
 1. Ka dheeraanshaha khamriga xooggan, inaan waxba laga cunin canabka waxa lagasoo saaro (cf. Tirintii. 6:3-4).
 2. Aan timaha la xiirin.
 3. Inaan la taabanin maydka. Waxa ay middani mamnuucaysay in laga qayb galo waxyaalaha ay dhaqan ahaan Yuhuuddu sameeyaan.
 4. Wasokhoobitaanka kediska ah ee ku sugan Tirintii. 6:9. Xaaladda Bawlos ee ku sugan Fal 21:23-25 arrintan ayuu koobsanayay. Waxa jirtay wakhti daahirin ah oo waaq dhac la bixiyo (cf. Tirintii. 6:9-12).

▣ **“madaxa xiirtaan”** Nidarkan Nazaritiga ah waxa lagu sheegay Tirintii 6. Kuwa qaatay nidarro joogto ah looma oggolayn inay timaha xiirtaan. Si kastaba ha ahaatee, nidarka ku meel gaadhka ah waxa qaabkiisu ahaa xiirista macbadka marka uu wakhtigu dhammaado. Aayaddani waxay tusinaysaa sida Bawlos uu isugu dehay inuu la dhaqmo dhaqanka uu isku dayay inuu wacdiyo (cf. I Korintos. 9:19-23; 10:23-33).

21:25 “ayaannu qornay” Tani waxa ay sheegaysaa hadalka la xidhiidha Guddiga Yerusaaalem (cf. Fal 15:19-20, 28-29). Qoraalkani waxa uu meesha ka saaray waxyaalihii dhexyaallay Yuhuudda rumaysadka leh iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn ee ahaa kaniisadihii qurba joogga (ka baxsanaa Falastiin). Si kastaba ha ahaatee, lama xidhiidho Yuhuudda rumayska lihi siday ula xidhiidhaan Axdiga Muuse.

21:26 “macbudka galay” Tani waxay ahayd mid dhibaato keenaysa oon xal u keenaynin.

NASB (UPDATED) TEXT: 21:27-36

²⁷Oo kolkii toddobadii maalmood u dhowayd inay dhammaadaan ayaa Yuhuuddii Aasiya ka timid isagii macbudka ku aragtay, markaasay dadkii oo dhan kiciyeen, wayna qabteen isagii, ²⁸iyagoo qaylinaya oo leh, Nimankii reer bini Israaiilow, na caawiya. Kanu waa ninka bara dadka oo dhan oo meel kasta jooga inay ka gees noqdaan dadka iyo sharciga iyo meeshan. Weliba wuxuu macbudka keenay dad Gariig ah, meeshan qoduuska ahna xaaraan buu ka dhigay. ²⁹Maxaa yeelay, mar hore waxay magaalada kula arkeen Tarofimos oo reer Efesos ahaa, kaasoo ay u maleeyeen in Bawlos macbudka keenay. ³⁰Markaasaa magaaladii oo dhammu kacday, dadkuna waa isku soo yaacay; kolkaasay Bawlos qabteen oo macbudka ka jiiddeen; oo markiiba albaabbadii waa la xidhay. ³¹Markay damceen inay isagii dilaan ayaa war u yimid sirkaalkii ka sarreeyey ciidankii in Yerusaaalem oo dhan rabshaysan tahay. ³²Markaasuu wuxuu watay askar iyo kuwo boqol askari u taliya, hoos buuna u soo orday; iyaguna. markay arkeen sirkaalkii sare iyo askartii, ayay Bawlos garaacidda ka daayeen. ³³Markaasaa sirkaalkii sare ku soo dhowaaday oo qabtay isagii, oo wuxuu ku amray in lagu xidho laba silsiladood; waana weydiyey ninkuu yahay iyo wuxuu sameeyey. ³⁴Qaar waxay ku qayliyeen wax, qaarna wax kale, dadkii badnaa dhexdiis, oo markuu runtii garan kari waayay rabshaddii aawadeed ayuu ku amray in qalcaddii la geeyo. ³⁵Oo markii Bawlos sallaankii fuulay, waxaa dhacay in askartii kor u qaaday isagii dadkii badnaa xoogooda aawadiis, ³⁶waayo, dadkii faraha badnaa waa daba socday, iyagoo qaylinaya oo leh, Naga fogeeya.

21:27 “Yuhuuddii Aasiya” Cadawiyada Bawlos sidoo kale waxay Yerusaaalem u imanayeen ciidda. Bawlos waxa uu dhex joogay carrada dadka diinta Yuhuudda haystaa joogeen.

21:28 “waa ninka bara dadka” Yuhuuddan Aasiya waxa ay Bawlos wacdintiisa u fasireen si kasoo horjeedda halkii ay ka ahayd dhammays tirka ballan qaadyada Axdiga Hore. Eedayntani waxay la mid tahay kii lagu sameeyay Istefanos oo kale (6:13). Waxa laga yaabaa in Bawlos uu middan sheegay, waxaanu Yuhuudda ku waafsanaa heerka ay fiqi ahaan taagan yihiin (22:20) ka hor intii aanu Masiixa la kulmin markii uu kusii socday Dimishq. Farriinta Masiixa qarnigii hore waxa loo arkayay in ay hoos joogto diinta Yuhuudda! Middan looma arkin oo keliya Bawlos oo sheegaya caalamiyanta oo ah badbaadada oo dunida oo dhan u ahaatay, laakiinse waxay sidoo kale tani la xidhiidhay arrin fiqi ahaaneed oo ah badbaadada ku imanaysa Masiixa oo la rumaysto.

▣ **“Weliba wuxuu macbudka keenay dad Gariig ah”** Dhacdadan lasoo jeediyay waxa la hor keenay Maxkamadda Israa’iil, halkaasoo nidarrada Nazarite ka lagu samayn jiray geeska koonfureed. Waxa sharci ahaan loo oggolaa kuwa aan Yuhuudda ahayni in ay soo galaan maxkamadda dibadda ee Macbadka oo keliya. Waxa uu ahaa xukun been ah (aayadda 29).

21:29 “Tarofimos oo reer Efesos ahaa” Yuhuuddan ka ahaaday Aasiya (Efesos) waxay yaqaaneen Bawlos iyo Tarofimos waxaanay mar hore qorsheeyeen dhimashada Bawlos (20:3). Hadda waxay arkeen jaaniskooda oo ay dilaan Bawlos (cf. aayadaha. 31,36).

21:30 “albaabbadii waa la xidhay” Waxa uu ahaa albaabka u dhexeeya Maxkamadda Israa’iil iyo Maxkamadda Haweenka. Macbadku waxa uu lahaa ilaaladiisa u gaarka ah ee ah Laawiyiinta oo nidaamka ilaalin jiray. Muhiimaddoodu waxay ahayd

1. In macbadka ay ka ilaaliyaan fawdaynta
2. Inay Bawlos ka ilaaliyaan inuu mardanbe Macbadka kusoo laabto.

Yuhuuddani waxay u dhaqmeen si lamida dadkii badnaa ee Efesos (Fal 19).

21:31 “sirkaalkii ka sarreeyey” Waxa weeyi macno ahaan hoggaamiyaha kun. Waxa uu ahaa martabadda ugu sarraysa ciidanka Roomaanka isla markaasna xaruntiisu ahay Yeruusaalem wakhtiga ciidda oo dadka tiradoodu saddex laab badan jirtay. Shaqadiisuna waxay ahayd inuu ilaaliyo kala dambaynta.

▣ **“ciidankii”** Waxay ku dhex noolaayeen Fortress Antonia, oo Macbadka maxkamaddiisa ilaalin jirtay. Waxa dhisay Herodoskii Waynaa, laakiinse Roomaanka ayaa u isticmaalay saldhig ay deggan yihiin madaxda askarta Roomaanku (cf. Josephus, *Wars* 5.5.8).

21:32 “askar iyo kuwo boqol askari u taliya” boqol u taliyuhu waxa uu ahaa taliyaha boqol askari. The Fortress Antonia waxay ilaalinaysay agagaarka Macbadka. Waxa ay ahayd meel aad loo ilaaliyo gaar ahaan maalmaha ciidaha.

21:33 “in lagu xidho laba silsiladood” Waxa loogala jeedi karaa (1) gacmaha iyo lugaha ama (2) labo askari oo Roomaan ahi xidhaan. Dhinaca kale askartu waxay aamineen inuu ahaa rabshad wade (cf. aayadda. 38).

21:34-35 Waxa ay tusinaysaa rabshaddii iyo cadhadii dadka (cf. aayadda. 30).

21:35 “sallaankii” Sallaamadan looga socon jiray Fortress Antonia oo macbadka galayay waxa si dadban loogu sheegay aayadda 32 “hoos buuna u soo orday.” Waxa jiray laba dhinac oo sallaamadani lahaayeen oo mid kastaa tegayay qayb ka mida macbadka. Roomaanku waxay rabeen in wixii kacdoon ah si dhakhso ah loo damiyo maadaama oo maalmaha ciiddu keeni kareen xasillooni darro.

21:36 “daba socday” Waxa ay la mid yihiin ereyadii lagaga daba qayliyay Ciise (cf. 22:22; Luukos 23:18; Yooxanaa 19:15). Siyaabo badan oo isku mida ayaa Yuhuudda iyo Roomaankuna ula dhaqmeen Ciise iyo Bawlos.

NASB (UPDATED) TEXT: 21:37-40

³⁷Markay u dhowayd in Bawlos qalcaddii la keeno ayuu sirkaalkii sare ku yidhi, Ma ii suurtoowdaa inaan wax ku idhaahdo? Markaasuu ku yidhi, Af Gariig ma taqaan? ³⁸Haddana miyaanad ahayn Masrigii maalmahan hortoodii rabshad kiciyey oo afarta kun oo nin oo dhiigqabayaal ah cidlada u kaxeeyey? ³⁹laakiin Bawlos wuxuu ku yidhi, Anigu waxaan ahay nin Yuhuudi ah oo reer Tarsos ah taasoo Kilikiya ku taal, oo waxaan ahay magaalo an yarayn waddanigeed. Waxaan kaa baryayaa inaad ii fasaxdid inaan dadka la hadlo. ⁴⁰Oo kolkuu fasaxayna. Bawlos isagoo sallaankii taagan, ayuu dadkii gacan u taagay; oo markii aad loo aamusay, ayuu af Cibraaniga kula hadlay iyagii, isagoo leh,

21:37 “Af Gariig ma taqaan?” Kornaylka waxa uu ka yaabay Bawlos oo ku hadlayay Afka Giriigga waayo wuxuu Bawlos u malaynayay fidno wade Masaari ah oo uu maqlay (cf. v. 38 and Josephus’ *Antiq.* 2.13.5; 20.8.6). kacdoonka Masriga ahi waxa uu ahaa intii u dhaxaysay sanadihii C.D. 52-57.

21:38 “Masrigii maalmahan” Waa *sicarii*, waa eray Laatin ah oo loo adeegsado dhiig qabayaasha. Waxa lagu magacaabi jiray “qiiroolayaal” Axdiga Cusub dhexdiisa (cf. Luukos 6:15; Fal 1:13). Waxay ahaayeen koox Yuhuuda oo rabay inay ka takhalusaan Roomaanka.

A. T. Robertson, *Word Pictures in the New Testament*, vol. 3, p. 382, ayaa sheegaya in eraygan uu adeegsaday Josephus isagoo tilmaamaya rabashad wadayaashii Masaarida iyo kuwii taageersanaa iyaga (cf. Josephus, *Wars* 2.13.5; *Antiq.* 20.8.6,10).

21:39 “magaalo an yarayn waddanigeed” Waa weedh (*litotes*, eeg sharraxa 12:18), Kaasi oo uu Bawlos u adeegsaday sheegitaanka muwaadinimada magaalo aqoonu taallo. Qoraalku haddaba ma sheegayo haddii arrintani ay ka yaabisay sirkaalka.

21:40 “Oo kolkuu fasaxayna.” Taliyahani wuxuu damcay in uu ogaado waxa arrintan oo dhami ay ku saabsanayd.

▣ **“ayuu dadkii gacan u taagay”** Waxa ay middani ahayd calaamad tusinaysa in la aamuso si uu qof u hadlo (cf. 12:17; 13:16; 19:33; 21:40; 26:1). Waxa laga yaabaa in ay ahayd arrin Bawlos uu bartay markii uu joogay Tarsos.

▣ **“ayuu af Cibraaniga kula hadlay iyagii”** Bawlos waxa uu dadkii kula hadlay luqada Aramaatiga (Yuhuuddu waxay bardeen luqada Aramaatiga wakhtiyadii ay hoos joogeen maamulka Aasiyaanka). Tanina waxa ay dadkii badnaa aamusiisay xoogaa wakhti ah (cf. 22:2).

SU’AALO FALQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Haddii nebiyada magaalo kasta joogaa Bawlos u sheegeen inaanu tegayn, maxay tahay sababta uu u tegay?
2. Sidee Yuhuudda rumaysadka lihi ula xidhiidhaan Axdiga Muuse?
3. Miyay Yuhuuddii Aasiyaanku dacwadda ay ku ogeen Bawlos sida ku sugan aayadda v. 28a ahayd run?
4. Taliyahan hadalkiisu (aayadda. 38) ma waxa uu tusinayaa inay jireen Yuhuud tiro yar oo yaqaanay afka Giriigga mise wuxuu Bawlos u maleeyay Masaari?

FALIMAHA RASUULLADA 22

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos oo is difaacaya 21:37-22:5	La hadlitaankii dadkii Yerusaaalem 21:37-22:21	Xidhistii iyo is difaacistii Bawlos (21:27-22:29) 21:37-22:1 22:2 22:3-5	Bawlos oo is difaacaya (21:37-22:5) 22:3-5	Bawlos oo la hadlayay Yuhuuddii Yerusaaalem 22:1-5
Bawlos waxa uu sheegayaa rumaysi yeelashadiisa 22:6-11 22:12-16		22:6-11 22:12-16	Bawlos waxa uu sheegayaa rumaysi yeelashadiisa 22:6-11 22:12-16	22:6-11 22:12-16
Bawlos waxa loo diray kuwa aan Yuhuudda ahayn 22:17-21		22:17-21	Bawlos oo loogu yeedhay inuu wacdiyo kuwa aan Yuhuudda ahayn 22:17-21	22:17-21
Bawlos iyo sirkaalkii Roomaanka 22:22-29	Bawlos dhalashadiisii Roomaanka ahayd 22:22-29	22:22-29	22:22-25 22:26 22:27a 22:27b 22:28a 22:28b 22:29	Bawlos dhalashadiisii Roomaanka ahayd 22:22-29
Bawlos oo horjooga Guddiga (22:30-23:11) 22:30-23:5	Senhadriinkii oo qaybsamay 22:30-23:10	22:30	Bawlos oo horjooga Guddiga (22:30-23:11) 22:30	Soo hor istaagistiisii Sanhadriinka hortiisa (22:30-23:11) 22:30

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 22:1

1Walaalayaal iyo aabbayaalow. maqla isdaafacidda aan imminka idiin sheegayo.

22:1

NASB “Walaalayaal iyo aabbayaalow.”
NKJV “Nimanyohow, walaalayaal iyo aabbayaal”
NRSV “walaalayaal iyo aabbayaal”
TEV “dadkaygii Yuhuuddow”
NJB “walaalayaalow, aabbayaalow”

Translator’s Handbook on the Acts of the Apostles, oo ay leeyihiin Newman iyo Nida ayaa waxa uu sheegayaa in middan loogala jeedo kuwa Bawlos la da’da ahaa iyo kuwii isaga ka waynaa (p. 419). Si kastaba ha ahaatee, waxa aan u malaynayaa in hadal duur xul ah (Istefanos ayaa hordhacan oo kale ku adeegsaday 7:2) maxaa yeelay Bawlos da’diisu waxay ka waynayd lixdan sidaas darteedna kumay habboonayn dadkan badan.

Waxa dadkan ka mid ahaa rumaystayaal. Waxa suurto gal ah in ereyga “walaalayaal” uu si gaara u tilmaamayo iyaga. si kastaba ha ahaatee, Bawlos waxa uu isla magacaabay dadkiisa iyo dhalashadiisa (cf. Rooma 9:1-5; Filiboy. 3:5).

☐ **“isdaafacidda”** Ereyga Ingiriisida ah ee “apology” ayaa waxa uu ka yimid eray Giriigga ah (*apologia*). Macnihiisu waxa weeyi isdifaacid sharciyaysan. Eraygan marar dhowra ayaa lagu dhex adeegsaday Falimaha Rasuullada iyadoo la xidhiidha maxkamadaynta Bawlos (cf. 25:16; II Timoteyos. 4:16).

NASB (UPDATED) TEXT: 22:2

²Kolkay maqlen inuu af Cibraaniga kula hadlay, ayay sidii hore ka sii aamuseen. Markaasuu ku yidhi,

22:2 “af Cibraaniga” Waxa loogala jeedaa luqada Aramaatiga. Dhammaanba injiilka waxa lagu sheegay in Ciise uu ku hadli jiray luqada Aramaatiga. Waxa ay la mid ahayd luqadii hore ee Cibraaniga, waxaanay ahayd luqadii Boqortooyadii Aasiyaanka. Yuhuudduna waxa ay barteen markii ay iyaga maamulkooda hoos joogeen. Tusaale ahaan Nexemyaah 8, halkaasoo Cesraa uu Sharciga Muuse ku akhriyay luqada Cibraaniga, Laawiyiinta ayaa dadka ugu tarjumi jiray luqada Aramaatiga (Nexemyaah 8:7).

▣ **“ayay sidii hore ka sii aamuseen.”** Bawlos hordhaciisa akhlaaqdu ku jirto isaga oo luqada Aramaatiga ku hadlayay waxa ay dadkan ku sababtay in ay xasilaan oo aammusaan. Waxa ay dooneen in ay maqlaan waxa uu sheegi rabo, taasina waxay jaanis wanaagsan u ahayd hoggaamiyayaasha diinta Yuhuudda.

NASB (UPDATED) TEXT: 22:3-5

³Waxaan ahay nin Yuhuudi ah oo ku dhashay Tarsos oo ku taal Kilikiya. Laakiin magaaladan baa laygu koriyey anoo Gamalii'eel hoostiisa wax laygu baray sidii caadadii adkayd oo sharcigii awowayaasheen, anigoo Ilaah qiiro u leh sida aad dhammaantiin maanta tihiin. ⁴Jidkanna waan silcin jiray tan iyo dhimasho, anigoo xidhaya oo xabsiga geeynaya rag iyo dumarba. ⁵Sidatan ayay iigu markhaati furayaan wadaadka sare iyo waayeelladii oo dhammuba, kuwaasoo aan warqado uga helay walaalaha, oo aan Dimishaq u sodcaalay inaan kuwa halkaas joogayna, iyagoo xidhxidhan, Yerusaaalem keeno si loo ciqaabo.

22:3 “Waxaan ahay nin Yuhuudi ah oo ku dhashay Tarsos” Bawlos waxa uu isku dayayaa inuu isku dhex daro dadkan badan ee Yuhuudda ah. waxa uu sheegayaa Yuhuudinimadiisa (cf. II Korintos. 12:22; Filiboy. 3:5-6). Waxa loo arkayay Yuhuudi qurbaha ku nool oo ku hadlayay luqada Giriigga.

Weedha ah “Laakiin magaaladan baa laygu koriyey” naxwe ahaan waxa ay tilmaami kartaa (1) Tarsos ama (2) Yerusaaalem. Macnahuna waxa uu tusinayaa Yerusaaalem. Haddii sidan ay tahay, markaa tabobarka Bawlos waxa uu ku qaatay meel la siman Tarsos.

▣ **“anoo Gamalii'eel hoostiisa wax laygu baray”** Waxa uu ahaa rabbaani aad loo tix geliyo (cf. 5:34-40). Waxa marar badan isaga lagusoo xigtay *Mishnah*. Bawlos waxa uu ahaa arday wax ku bartay dugsigii rabbaaniga ee Hillel. Dadkan badan waxa ka yaabisay hadalkan. Eeg Mawduuca Gaarka ah 5:34.

▣ **“sidii caadadii adkayd oo sharcigii awowayaasheen”** Tani waxay tusinaysaa inuu ahaa Farriisi (cf. 23:6; 26:5) iyo inuu ahaa qiirroole (cf. aayadda. 4; Galaatiya. 1:14; Filiboy. 3:6). Farrisiintu waxay u hoggaansanaayeen addeecitaanka dhaqamada diiniga ah (Talmuud), oo fahirayay Axdiga Hore.

▣ **“sida aad dhammaantiin maanta tihiin”** Bawlos waxa uu sheegayaa tawxiid lahaanshohooda iyo sida ay ugu go'san yihiin. Isaguna waxa uu hore u ahaan jiray sidooda oo kale.

22:4 “waan silcin jiray” Bawlos intii adeeggiisa uu waday waxa uu qoomammayn jiray waxyaalihii uu hore u samayn jiray. Middana marar badan ayuu sheegayaa (cf. 9:1,13,21; 22:4,19; 26:10-11; Galatiya. 1:13,23; Filiboy. 3:6; I Timoteyos. 1:13). Bawlos waxa uu naftiisa ku sheegayaa in uu yahay ka uugu qiimaha yar rasuullada sababtuna waa waxyaalihii uu hore u samayn jiray (cf. I Korintos. 15:9; II Korintos. 12:11; Efesos. 3:8; I Timoteyos. 1:15).

▣ **“Jidkanna”** Waxa uu ahaa magacii ugu horreeyay ee ay lahayd kaniisadda Masiixiyaddu (cf. 9:2; 19:9,23; 22:4; 28:14,22). Waxa ay sheegaysaa

1. Ciise oo ah “Jidka” (cf. Yooxanaa 14:6)
2. rumaysadka kitaabiga ah oo qaab nololeed ah (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 5:32-33; 31:29; Sabuurka. 27:11; Ishacyaah. 35:8)

▣ **“tan iyo dhimasho”** Bawlos waxa uu ka qayb qaatay dilka kuwo ka mid ah Masiixiyiin (cf. 8:1,3; 26:10)! Waxa uu ka qayb qaatay dilkii Istefanos (cf. 7:58, 8:1).

▣ **“anigoo xidhaya oo xabsiga geeynaya rag iyo dumarba”** Xaqiiqada ah Bawlos oo dumarka waxyaalan ku sameeyay waxa ay tusinaysaa sida uu wax u silcin jiray.

22:5 Bawlos waxa uu la wadaagayaan dhacdada ku sababtay inuu Ciise Masiix rumaysto markii uu kusii socday Dimishiq (cf. Fal 9).

▣ **“iyo waayeelladii”** Waxa loogala jeedaa “waayeellada oo dhan.” Luukos waxa uu eraygan u adeegsanayaa Sanhadriinka sida ku xusan Luukos 22:66. Ma aha ereyga caadi ahaan loogu adeegsaday hoggaamiyayaasha Yuhuudda ee Yerusaaalem (Sanhadriinka). Waxa laga yaabaa in ay sheegayso guddi hoosaad maamul.

▣ **“aan warqado uga helay”** F. F. Bruce, *Paul: Apostle of the Heart Set Free*, ayaa waxa uu dhigayaa falaqayn fiican oo ku saabsan xuquuqda Sanhadriinka ee waddamada ku hareeraysaan (p. 72). Warbixin taariikhi ah oo dheeraada waxaad ka eegtaa I Macc. 15:21 iyo Falvius Josephus.

▣ **“kuwa halkaas joogayna”** Waxa sheegaysaa in kuwani ay ahaayeen Yuhuud rumaysad leh oo ka qaxay silcintii ka socotay Yerusaaalem dhexdeeda.

NASB (UPDATED) TEXT: 22:6-11

⁶Oo waxaa dhacday, intaan sodcaalayay oo Dimishaq u soo dhowaanayay, iyadoo duhur ah, in dhaqsiba iftiin weyn oo samada ka yimid hareeraha ka iftiimay. ⁷Markaasaan dhulka ku dhacay, oo waxaan maqlay cod igu leh, Sawlosow, Sawlosow, maxaad ii silcinaysaa? ⁸Markaasaan u jawaabay oo ku idhi, Yaad tahay. Sayidow? Markaasuu igu yidhi, Waxaan ahay Ciisaha reer Naasaret oo aad silcinaysid. ⁹Oo kuwii ila joogayna runtii waxay arkeen iftiinkii, laakiin ma ay maqlin kii ila hadlay codkiisii. ¹⁰Markaasaan ku idhi. Maxaan sameeyaa. Rabbiyow? Kolkaasaa Rabbigu igu yidhi, Kac oo Dimishaq gal: meeshaasana laguugu sheegi doonaa waxa ku saabsan waxyaalihii lagu amray inaad samaysid oo dhan. ¹¹Markaan waxba arki waayay dhalaalkii iftiinka aawadiis, kuwii ila joogay ayaa gacanta igu hagay oo waxaan imid Dimishaq.

22:6 “iyadoo duhur ah” Waa faahfaahin dheeraad ah oo aan laga helaynin 9:3.

22:7 waa kusoo celiska 9:4.

22:8

NASB, NJB “Ciisaha reer Naasaret”

NKJV, NRSV,

TEV “Ciisihii Naasaret”

Bawlos saddex jeer ayuu markhaati furkiisa shaqsi ahaaneed kula wadaagayaan Fal 9:1-31; 26:4-18, laakiin halkan iyo 26:9 waxa weyi meelaha uu si gaara ugu adeegsanayo. Macnaha loogala jeedaa waa “Ciisaha reer Naasaret.” Ereygani sida ku sugan 24:5 waa dheel dheel, laakiin waxa uu weedh waxsii sheegineed ku yahay Matayos. 2:23. Waxa suurto gal ah in aanay ahayn arrin juquraafi ahaaneed, laakiise ay tahay magac Masiixu leeyahay oo ka imanaya “laan” (cf. Ishacyaah. 11:1; 53:2) oo ka ahaatay ereyga Cibraaniga ah ee *neser* (cf. Yeremyaah. 23:5; 33:15; Sekeryaah. 3:8; 6:12). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:22.

▣ **“oo aad silcinaysid”** ka eeg sharaxa buuxa ee 9:4.

22:9 “laakiin ma ay maqlin kii ila hadlay codkiisii” Ma jiro is khilaafitaan u dhexeeya arrinta ku saaban rumaysad yeelashadii Bawlos ee ku sugan 9:7 iyo 22:9. Naxwe ahaan xagga luqada Giriigga waxa ay ku tusinaysaa in kuwii isaga la socday ay maqlen codka, laakiinse aanay fahmin hadalkiisa. Ka eeg falaqayn buuxda 9:7.

22:10 “waxyaalihii lagu amray inaad samaysid oo dhan” Waa fal dhammays tiran oo mafcuulku soo horreeyo waxna tusmaynaya. Waxa ay ka tarjumaysaa hadalladii Ciise kula hadlay Ananiyas sida ku sugan 9:15-16. Bawlos waxa hortaallay muhiimad wayn oo laga rabay inuu qabto. Siyaabo badanna aragtida Bawlos waxa ay ku raacaysay nebiyada Axdiga Hore (cf. Ishacyaah. 6; Yeremyaah. 1; Yexesqeel. 2-3).

22:11 Waxaan u malaynayaa in tani ahayd waxa Bawlos ku sababay “qodax jidhkiisa muday.” Aragtiyo la xidhiidha qodxaha jidhka Bawlos ayaa waxay yihiin:

1. Aabbayaashii hore ee kaniisadda, Luther, iyo Calvin, waxay sheegayaan inay ahayd dhibaato ruuxi ahaaneed oo ku ladhan dabeecadda leexatay (i.e., “jidhka dhexdiisa”)
2. Chrysostom waxa uu sheegayaa inay ahayd dhibaatooyin la xidhiidh shaqsiyaadka (cf. Tirintii. 33:55; Xaakinnadii. 2:3)
3. Qaar waxa ay sheegayaan inay ahayd suuxdin
4. Sir William Ramsay waxa uu leeyahay waxay ahayd xanuun kaneeco.
5. Anigu waxaan u malaynayaa inay ahayd habeen, oo ah dhibaato aragga la xidhiidha (barbar dhig Galatiya. 4:13-15 iyo 6:11) oo indho beelkan sababtay markii uu ku sii socday Dimishiq (cf. Fal 9, waxa suuro gal ah inay u noqonayso Axdiga Hore sida ku xusan Yashuuca. 23:13)

NASB (UPDATED) TEXT: 22:12-16

¹²Oo mid la odhan jiray Ananiyas, oo nin cibaadaysan ahaa sida sharcigu leeyahay, oo ahaa mid Yuhuuddii halkaas joogtay oo dhanba marag wanaagsan u furtay, ¹³ayaa ii yimid oo iskay ag taagay isagoo igu leh, Walaal Sawlosow, araggaaga hel. Oo saacaddiiba waan arkay isagii. ¹⁴Markaasuu igu yidhi, Ilaaha awowayaasheen ayaa ku doortay inaad doonistiisa ogaatid, iyo inaad Kan Xaqa ah aragtid oo aad afkiisa cod ka maqashid. ¹⁵Maxaa yeelay. dadka oo dhan hortiiisa waxaad isaga uga markhaati furaysaa waxaad aragtay oo aad maqashay. ¹⁶Haddaba maxaad u sugaysaa? Kac ha lagu baabtiiso, oo dembiyadaada iska maydh, adoo magiciisa ku baryaya.

22:12 Waa faahfaahin ku saabsan Ananiyas oo ka badan midda 9:10. Waxa uu ahaa shakhsi la mid ahaa Bawlos oo lahaa cibaado marka loo eego Sharciga Muuse. Waxa laga yaabaa in tani ay tusinayso inuu ahaa Farriisi.

1. Luukos ayaa sidan si la mida u tilmaamaya Simecoon, oo ahaa kii Ciise ku dhex arkay macbadka isaga oo ilmo yar ah (cf. Luukos 2:25).
2. Luukos sidoo kale waxa uu u isticmaalayaa Yuhuuddii qurba joogga ahayd ee Yerusaaalem yimid maalintii Bentakostiga markii awoodda Ruuxu timid (cf. Fal 2:5).
3. Luukos waxa uu mar saddexaad u isticmaalayaa dadkii aasay Istefanos kaddib markii dhagaxa lagu dilaycf. Fal 8:2).

Haddaba, ereyganii rumaystaha Masiixa ulama xidhiidho sida uu ula xidhiidho qofka daacadda u ah diinta Yuhuudda. Waxa loogu yeedhay “xer” sida ku xusan 9:10, sidaasi darteedna waxa uu noqday rumayste. Ilaa haddana inkasta oo uu ahaa Masiixi, waxa uu tix gelinayay dadkii Yuhuudda ahaa ee ku dhaqnaa Dimishiq.

22:13 Ananiyas u adeegitaankiisii Bawlos waxa uu ina tusinayaa in aanay jirin kala qaybsanaan u dhexaysay rumaystayaasha Axdiga Cusub wadaadada (koox si gaara loo subkay) iyo dadka caadiga ah. Ciise hadalladiisu waxay amrayeen:

1. gacmo saarista Bawlos (cf. 9:12,17) iyo amarka bogsiinta (fal amar ah, aayadda. 13, ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 6:6)
2. in doonistiisa uu u muujiyo adeegga Bawlos (aayadda. 15)
3. inuu Bawlos u sheego in la baabtiiso (waxa laga yaabaa in Bawlos loo baabtiisay isagoo ahaa Yuhuudi looga baahna inuu ku biiro diinta Yuhuudda, aayadda. 16)
4. Bawlos oo noqda qalab waxa ay ahayd in uu ka buuxsamo Ruuxu (cf. 9:17)

Waxa aad arki kartaa qalbiga Ananiyas marka uu Bawlos oo silciye ahaa (cf. 9:13-14) uu ugu yeedhayo “Walaal Sawlos.”

22:14 “Ilaaha awowayaasheen” Weedhan waxa loo isticmaalay sheegitaanka Ilaaha caabudaadda Yuhuudda. Bawlos waxa uu rabaa inuu caddeeyo inuu ahaa YHWH (eeg Mawduuca Gaarka ah 1:68) kii isaga kula xidhiidhay Wiilkiisa, Ciise. Bawlos muu sheegin ilaah kale oon ka ahayn Ilaah Yuhuudda.

▣ **“inaad doonistiisa ogaatid,”** YHWH doonista ugu horreysa ee uu ka rabo aadanaha waa inay gaartaan Ciise (cf. Yooxanaa 6:29,40). Doonista dheeraadka ah ee Ilaah ka rabo Bawlosna waa inuu Rasuul u ahaado kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. 9:15; 22:15; 26:16).

▣ **“inaad Kan Xaqa ah aragtid”** Waa magac Masiixu leeyahay (cf. Sabuurka. 45; 72; Fal 3:14; 7:52; I Yooxanaa 2:1). Bawlos waxa uu si gaara faa’ido ugu haysan doonay waxyiga Ciisahan ammaanmay (sidii Istefanos sameeyay oo kale, cf. 7:55-56).eeg Mawduuca Gaarka ah: Xaqnimada 3:14.

▣ **“oo aad afkiisa cod ka maqashid.”** Waxay tani u muuqataa codka ka ahaaday samada sida ku sugan aayadaha 7-8 (i.e., *Bat Kol*, cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 4:12; I Boqorradii. 19:12-13; Ayuub 4:16; Yeremyaah. 25:30; Yexesqeel. 1:25,28; Yoo’eel 3:16; Caamoos 1:2; Luukos 3:22; 9:35; Fal 10:13,15), laakiin waxa ay la mid noqon kartaa aayadaha. 17-21. Waxa kale oo suuro gala inay sheegayo riyooyinkii dhowrka ahaa ee Bawlos uu helay intii uu adeeggiisa waday. Ka eeg liiska aayadaha. 17-21.

22:15 “dadka oo dhan hortiisa waxaad isaga uga markhaati furaysaa” Waa xaqiiqada ah in injiilka Ciise uu u ahaaday dadka oo dhan (cf. Yooxanaa 3:16; 4:42; I Timoteyos. 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; II Butros. 3:9; I Yooxanaa 2:1; 4:14). Maaha in dhammaan ay wada aqbalayaan, maaha in dhammaan ay wada maqlaysaan, laakiinse dhammaantood waxa ay ku guda jiraan jacaylka Ilaah iyo waaqdhaca Ciise Masiix iyo wacdinta Bawlos. Tanina waxa weeyi xaqiiqada ay dadkan badani diideen (cf. aayadda. 22).

Bawlos si kas ah ayaanu u isticmaalin weedha “kuwa aan Yuhuudda ahayn” ee Ananiyas uu ugasoo gudbiyay Ciise (9:15). Bawlos waxa uu gartay sida ereygan *goein* (kuwa aan Yuhuudda ahayn) uu ahaa mid aan lagula sheekaysan karin Yuhuuddan. Arrinta la xidhiidha cirqiga iyo isla waynaantu waxay nebiyada Axdiga Hore ka reebtay inay waxsii sheegidoodu noqoto mid cid walba koobsanaysa.

▣ **“waxaad aragtay oo aad maqashay”** Falkan hore waa fal dhammaystiran oo wax tusinaya; ka labaadna waa fal wakhti tegay ah. sababta ay u yihiin ficilo kala duwanna lama garanayo. Waxay u muuqdaan inay isku mid yihiin. Bawlos waxa uu xasuusnaan doonaa la kulankan shakhsi ahaaneed ee Ciise noloshiisa oo dhan. Saddex jeer ayaanu ku dhex sheegayaa Falimaha Rasuullada. Markhaati furkiisana waxa uu ka bixiyay sunagog kasta.

22:16 “ha lagu baabtiiso, oo dembiyadaada iska maydh” Waa labo ficil oo amar ah. waxa ay la xidhiidhaa is maydhistii Axdiga Hore (cf. Laawiyiintii. 11:25,28,40; 13:6,34,56; 14:8-9; 15:5-13,21-22,27; 16:26,28; 17:15-16; Tirintii. 8:7,21; 19:19; Sharciga Kunoqoshadiisa. 23:11). Halkana waxa loogu isticmaalay iyadoo calaamad u ah in ruuxi ahaan la inagu nadiifiyay Masiixa (cf. I Korintos. 6:11; Efesos. 5:26; Tiitos 3:5; Cibraaniyada. 10:22). Baabtiisku waxa uu ahaa sidii ay kaniisaddii hore fagaaraha ugu qiran jirtay rumaysadka. Ka eeg sharaxaadaha iyo Mawduuca Gaarka ah 2:38 falaqayn fiqi ahaaneed oo dhaaraad ah.

Fiiro u yeelo in codka dhexe uu tilmaamayo baabtiiska (fal amar ah oo tegay) iyo maydhitaan (fal amar oo isna wakhti tegay ah). Bawlos iskama maydhi karo dembiyadiisa, laakiin waa uu is baabtiisi karaa. Waxa badanaa la sheegay in muqurintu ay tahay tusaalaha Axdiga Cusub (Rooma 6 iyo Kolosay 2), laakiin halkan baabtiisku waxa uu kula xidhiidhaa shabahaada maydhitaanka (cf. 2:38; I Korintos. 6:11; Efesos. 5:26; Tiitos 3:5; Cibraaniyada. 10:22). Fiqi ahaan I Butros. 3:21 waxa uu tusinayaa in uu yahay calaamad.

Mufasiriinta casriga ahi waa inay ka taxadiraan inay wax ku saleeyaan falka mafcuulku soo horreeyo waayo waxa uu koobsanayaa luqadii Koine Giriigga. Bawlos in la baabtiisa waxa lagu sheegay 9:18. Baabtiiska Bawlosna nooca uu yahay maaha arrintu, laakiin waa baabtiiskiisa laftiisa.

“adoo magiciisa ku baryaya.” “Magacu” maaha sidii qaab sixir ah, laakiin waa garawsashada iyo bilaabitaanka xidhiidh lala yeesho Ciise (fal amar ah), kaasi oo soo saaraya la midnimada Masiixa nolol ku salaysan. Qaabkii kaniisaddii hore baabtiiskeedu ahaa waxa afka lagaga dhawaaqi jiray “Ciise waa Rabbi” (cf. Rom. 10:9-13; I Korintos. 1:2; II Timoteyos. 2:22). Furuu haddaba maaha isla ereyada laftooda, laakiinse waa qalbiga (rumays, aqbal). Eeg sharaxa 2:38 iyo Mawduuca Gaarka ah 2:21.

NASB (UPDATED) TEXT: 22:17-21

¹⁷Oo waxaa dhacday, markaan Yerusaaalem ku soo noqday dabadeed, intaan macbudka ku tukanayay, inaan riyooday. ¹⁸oo waxaan arkay isagoo igu leh, Degdeg. oo dhaqso Yerusaaalem uga bax; maxaa yeelay. markhaatigaad ii furaysid kaama ay aqbali doonaan. ¹⁹Markaasaan idhi, Rabbiyow, iyaga qudhoodu way og yihiin inaan xidhxidhay oo aan sunagog walba ku garaacay kuwa ku rumaystay: ²⁰oo markii la daadshay dhiigga Istefanos oo ahaa markhaatigaaga, aniguna waan ag taagnaa oo u oggolaanayay oo haynayay kuwii isagii dilay dharkoodii. ²¹Markaasuu igu yidhi, Tag, maxaa yeelay, waxaan kuu dirayaa meel fog inaad dadka aan Yuhuudda ahayn ugu tagtid.

22:17-21 Tani waa tusaale kale oo ah riyoooyinkiis gaarka ahaa ee Bawlos (cf. 18:9-10; 23:11; 27:23-24). Macnaha ay halkan ugu jirtana waxa ya ku shaqaynaysaa waxsii sheegista aayadda. 14.

22:17 “markaan Yerusaaalem ku soo noqday” Markhaati furka Bawlos ee cutubka 9 iyo halkan waxay u muuqataa inay tusinayso isaga oo kusoo laabtay Yerusaaalem isla markii uu rumaysadka yeeshay, laakiin Galatiya 1:11-24 waxa ay tusinaysaa wakhti dheer (ka badan saddex sano) ka hor intii aanu Bawlos soo laabanin.

▣ **“inaan riyooday”** ka eeg sharraxa 10:10.

22:18 Ciise waxa uu Bawlos kula hadlayaa labo amar: “Degdeg” iyo “dhaqso uga bax.” Digniinta Ciise waxay ku baraarujinaysaa kacdoonka Yuhuudda Giriigga ah oo raba in ay dilaan Bawlos sida ku xusan 9:29.

22:19 “Rabbiyow” Naxwe ahaan middani waxay noqon kartaa mid ahaan “Ilaah awowyaasheen” (aayadda 14) ama “Kan Xaqa ah” (aayadda 14).

Dadka Yuhuudda ahi waxay u fahmi dooneen YHWH, laakiin rumaystayaasha halkaas ku sugnaa waxay u fahmayeen Ciise. Waxyaalaha guud ahaan lagu adeegsaday Axdiga Hore ayaa Ciise loogu isticmaalay Axdiga Cusub. Waxa weeyi “midawga saddexmidnimada” (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:32 iyo 2:39)!

▣ **“inaan xidhxidhay oo aan sunagog walba ku garaacay”** waxa weeyi fal tusinaya sii socoshada ficil bilaabay wakhti tegay. Eeg sharraxa buuxa ee 22:4.

▣ **“kuwa ku rumaystay”** Eeg Mawduucyada Gaarka ah ee isla xidhiidha 2:40, 3:16, iyo 6:5.

22:20 ka eeg sharaxa 7:58-59 iyo 8:1. Bawlos waxa uu sheegayaa ficiladiisii hore ee murugada lahaa isaga oo adeegsanaya fal oon dhammaystirnayn.

1. Waxa uu la joogay dadkaas badan.
2. Waxa uu waafaqsanaan dhagxinta.
3. Waxa uu haystay maryaha kuwii dhagxinayay Istefanos.

Wacdintii Istefanos iyo dhimashadiisiina waxa ay saamayn ku yeeshen Bawlos.

22:21 “waxaan kuu dirayaa meel fog inaad dadka aan Yuhuudda ahayn ugu tagtid” Waxa weeyi arrin tusinaysa muhiimadda ku jirtay socdaallada adeegitaanka ah ee Bawlos iyo isaga oo ka hor markhaati furay siraakiisha xukuumadda ee Falastiin dhexdeeda iyo sidoo kale Rooma Kaysar hortiisa (cf. 23:11). Waxa uu gartay in hadalkani uu kicin doono dadka!

NASB (UPDATED) TEXT: 22:22-29

²²Wayna dhegasteen ilaa hadalkaas; markaasay codkoodii sare u qaadeen iyagoo leh. Dhulka ka fogee ninka caynkan ah. maxaa yeelay, ma qummana inuu noolaado. ²³Oo markay qaylinayeen oo dharka iska xoorayeen oo siigo hawada ku tuurayeen, ²⁴ayaa sirkaalkii sare wuxuu amray in isagii qalcaddii la soo geliyo, oo wuxuu u sheegay in karbaash lagu imtixaamo si uu ku ogaado sababtii ay sidaas ugu qaylinayeen isagii. ²⁵Oo markay suumanka ku xidheen dabadeed ayaa Bawlos wuxuu ku yidhi boqol-u-taliyihii oo ag taagnaa. Ma qaynuun baa inaad karbaashtaan nin reer Rooma ah oo aan la xukumin? ²⁶Markii boqol-u-taliyihii taas maqlayna. wuxuu u tegey sirkaalkii sare oo u sheegay, isagoo leh, Maxaad samaynaysaa? Waayo. ninkanu waa nin reer Rooma ah. ²⁷Markaasaa sirkaalkii sare u yimid oo ku yidhi isagii, Ii sheeg, ma nin reer Rooma ah baad tahay? Markaasuu yidhi, Haah. ²⁸Kolkaasaa sirkaalkii sare u jawaabay oo ku yidhi, Waddanimadan waxaan siistay lacag badan. Laakiin Bawlos wuxuu ku yidhi, Anigu reer Rooma ayaan u dhashay. ²⁹Haddaba kuwii doonayay inay isagii imtixaamaan markiiba way ka tageen, xataa sirkaalkii sarena waa cabsaday markuu ogaaday inuu yahay reer Rooma, maxaa yeelay, wuu xidhay.

22:22 Hadalkoodu waxa uu wataa labo qaybood:

1. “Dhulka ka fogee ninka caynkan ah (ficol amar ah)” (cf. Luukos 23:18; Fal 21:36)
2. “ma qummana inuu noolaado (fal aan dhammays tirnayn oo wax tusinaya)” (cf. Fal 25:24)

Waxa ay muujiyeen qiiradoodii ay ka lahaayeen diinta iyo cirqiga. Dadka oo dhamina taariikh ahaan iyo dhaqan ahaan ayay wax shuruud kaga dhigaan.

22:23

NASB	“oo dharka iska xoorayeen”
NKJV	“maryihii iska xooreen”
NRSV	“iska tuurayeen maryohooda”
TEV	“lulaya go’yaashooda”
NJB	“wadhfinaya go’yaashooda”

Qayladan iyo lulista maryaha iyadoo cirka loo tuuraa waxay ahaaday calaamad Axdiga Hore ah oo lagaga soo horjeedo cayda (*Greek-English Lexicon*, Louw iyo Nida, vol. 1, p. 213, cf. 14:14).

▣ **“oo siigo hawada ku tuurayeen”** Bawlos waxa uu nasiib ku lahaa iyadoo meeshan aanay dhagaxaani oollin. Qof oo carrada madaxa lagaga shubaa waxay calaamad u ahayd murugada (cf. Yashuuca. 7:6; I Samuu’eel. 4:12; II Samuu’eel. 1:2; Ayuub 2:12), halkanna waxa lagaga murugooday cayda (cf. Ishacyaah. 47; Baroorashadii Yeremyaah. 2; Miikaah 1:10).

MAWDUUC GAAR AH: ISUGU IMAADKA BAROORDIIQ

Israa’iiliyiintu waxa ay murugada dhimashada qofka la jecel yahay ku macneyeen in ay tahay tawbadkeen shaqsi ahaaneed, sida dem biyada guud oo kale, weaxayana u muujiyeen dhowr siyaabood

1. In xadhigga korela gooyo, Bilowgii 37:34; 44:13; Xaakinnada 11:35; II samuu’eel 1:11; I Boqorrada 21:27; Ayuub 1:20
2. In ay dhar jawaan ah xidhaan, Bilowgii 37:34; II samuu’eel 3:31; I Boqorrada 21:27; Yeremyaah 48:37
3. In ay kabaha iska bixiyaan, II samuu’eel 15:30; Ishacyaah 20:3
4. In gacmaha madaxa la saarto, II samuu’eel 13:9; Yeremyaah 2:37
5. In dambas madaxa la saarto, Yashuuca 7:6; I Samuu’eel 4:21; Nexemiyaah 9:1
6. In dhulka la fadhiisto, Baroorashadii Yeremyaah 2:10; Yexesqeel 26:16 (in ay dhulka seexdaan, II samuu’eel 12:16); Ishacyaah 47:1
7. In ay naasaha garaacaan, I samuu’eel 25:1; II Samuu’eel 11:26; Naaxuum 2:7
8. In ay jidhkooda jeexaan, Sharciga Ku Noqoshadiisa 14:1; Yeremyaah 16:6; 48:37
9. Soon, II samuu’eel 1:16,22; I Boqorrada 21:27
10. Baroorasho lagu celceliyo, II Samuu’eel 1:17; 3:31; II Taariikhda 35:25
11. Dhukurasho, (timaha oo la iska qaado ama la iska xiiro), Yeremyaah 48:37
12. Gadhka oo la gaabiyo, Yeremyaah 48:37
13. In la daboolo madaxa ama wejiga, II Samuu’eel 15:30; 19:4

22:24 “sirkaalkii sare” waa erayga *chiliarch* (cf. aayadaha. 27-29), oo macnihiisu yahay taliyaha 1000 askari, sida *centurion* (cf. aayadaha. 25,26) uu u yahay taliyaha 100 askari. Si kastaba ha ahaatee, tirooyinku way isla xidhiidhaan. Ninkanna waxa uu ahaa taliyaha askartii joogtay Yerusaaalem.

▣ **“qalcaddii”** Tani waxa ay tilmaamaysaa Fortress Antoniya oo ku taallay agagaarka macbadka. Waxa la dhisay wakhtigii Aasiyaanka ee maalmihii Nexemyaah (cf. Nexemyaah. 2:8; 7:2). Herodos kii Waynaa ayaa dib magac ugu bixiyay Marc Antony dabadiis. Wakhtiyada ciiddana Yerusaaalem waxa dadka deggan tiradoodu laban laabmi jirtay saddex jeer. Roomaankuna waxa ay ciidammo badan kasoo kaxayn jireen Kaysariya iyagoo keenaya Fortress Antoniya si ammaanka loo sugo.

▣ **“karbaash lagu imtixaamo”** Waxa ay tusinaysaa “garaacitaan si warbixinta looga helo.” Karbaashku waxa uu ahaa nooc ka mid ah jidh dilka kuwo badanina way u dhinteen. Waxa uu aad uuga sii xumaa garaacitaanka Yuhuudda iyo ulaynta Roomaanka. Jeedal harag ah oo afka hore lagaga xidhay bir, dhagax, ama lafo ayaa lagu garaaci jiray maxaabiista.

22:25 “suumanka ku xidheen” Caadi ahaan waxa dhibanayaasha lagu xidhi jiray si fidsan oo karbaashku si fiican ugu dhacayo.

▣ **“Ma qaynuun baa”** Askartani siyaabo kala duwan ayay sharcigooda dadka ugula kala dhaqmi jireen:

1. Qofka haysta dhalasha Roomaanka ah xad laguma oofin karo (cf. 21:33 iyo 22:29)
2. Qofka dhalashada Roomaanka ah haysta lama karbaashi karo (cf. Livy, *History* 10:9:4; Cicero, *Pro Rabirio* 4:12-13)
3. Bawlos laguma helin denbi (cf. 16:37)

22:27 “ma nin reer Rooma ah baad tahay” Sirkaalkan Roomaanka ahi muu rumaysnayn in Bawlos uu yahay nin dhalasho Roomaana haysta.

22:28 “Waddanimadan waxaan siistay lacag badan” Waxa jirta saddex siyaabood oo lagu noqon karay Roomaan:

1. Dhalasho
2. Dawladda oo adeeg gaar ah la siiyo.
3. Iibsaho (Dio Cassius, *Rom. Hist.* 60:17:5-6)

Askarigan magaciisu waxa uu tusinayaa in uu dhalashadiisa iibsaday xilligii maamulkii Kalawdiyos isaga oo ahaa Giriig (Claudius Lysias, cf. 23:26). Kalawdiyos naagtiisii Messaline, ayaa dhalashada Roomaanka ku iibin jirtay lacag aad u badan.

NASB (UPDATED) TEXT: 22:30

³⁰laakiin maalintii dambe, isagoo doonaya inuu hubsado waxa Yuhuuddu ku dacwaysay, ayuu isagii furay, oo wuxuu wadaaddadii sare iyo shirka oo dhan ku amray inay isu yimaadaan, markaasuu Bawlos hoos u keenay oo soo hor taagay iyagii.

22:30 “oo wuxuu wadaaddadii sare iyo shirka oo dhan ku amray inay isu yimaadaan,” Tani waxa ay tusinaysaa awoodda Roomaanka. Sanhedriinka waxa lagu qasbay in ay kulmaan, waxaana suuro gala inay ahayd Fortress Antoniyo dhexdeeda. Tani waxay u muuqataa kula sharci darro ah oon caadi ahayn.

Waxay ahayd Bawlos inuu hor fadhiisto xaakinnada isaga oo ah Roomaan.

SU’AALO FALQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu Bawlos u damcay inuu isku hordifaaco dadka?
2. Muxuu Luukos markhaatifurka Bawlos markii uu ku socday Dimishiq saddex jeer u diiwaan gelinayaa?
3. Sidee isticmaalka Ruuxa ee Ananiyas aanay u tusinayn isagoon ka mid ahayn Rasuullada?
4. Diiwaan geli riyoooyinkiis gaarka ahaa ee Bawlos. Muxuu ugu baahna kulamadan badan een caadiga ahayn?
5. Sidee waxa kasoo baxay is difaacitaanka Bawlos uu uga habboon yahay qorshaha Ilaah?

FALIMAHA RASUULLADA 23

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos oo horjooga guddiga	Senhadriinkii oo qaybsamay	Bawlos oo horjooga Senhadriinka (22:30-23:10)	Bawlos oo horjooga guddiga (22:30-23:11)	Soo hor istaagistiisii Senhadriinka (22:30-23:11)
22:30-23:5	22:30-23:10	22:30-23:5	23:1-3	23:1-5
23:6-10		23:6-10	23:4 23:5 23:6 23:7-9 23:10	23:6-10
	Shirqoolistii Bawlos	B awlos waxa loo diray Kaysariya		
23:11	23:11-22	23:11	23:11	23:11
Shirqoolkii loo dhigay nolosha Bawlos			Shirqoolkii loo dhigay nolosha Bawlos	Yuhuudda oo kasoo horjeeday Bawlos
23:12-22		23:12-15 23:16-22	23:12-15 23:16-18	23:12-15 23:16-22 Bawlos waxa loo xawilay Kaysariya
			23:19 23:20-21 23:22	23:23-25
Bawlos waxa loo diray xaakinkii Feelikos	Waxa loo diray Feelikos		Bawlos waxa loo diray xaakin Feelikos	
23:23-30	23:23-35	23:23-25 23:26-30	23:23-25 23:26-30	23:26-30
23:31-35		23:31-35	23:31-35	23:31-35

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 23:1-5

¹Markaasaa Bawlos shirka aad u fiiriyey oo ku yidhi, Walaalayaalow, ilaa maalintan ayaan qalbi wanaagsan ku noolaa Ilaah hortii. ²Kolkaasaa wadaadkii sare oo Ananiyas la odhan jiray ku amray kuwii ag taagnaa inay afka ku dhuftaan. ³Markaasaa Bawlos ku yidhi, Ilaah baa kugu dhufan doona, kaaga derbi caddaysanow; ma waxaad u fadhidaa inaad sharciga igu xukuntid oo aad ku amartid in laygu dhufto si aan sharcigu lahayn? ⁴Markaasaa kuwii ag taagnaa waxay ku yidhaahdeen, Ilaah wadaadkiisa sare miyaad caayaysaa? ⁵Bawlosna wuxuu ku yidhi, Walaalayaalow, anigu ma aan garanaynin inuu wadaadkii sare yahay; maxaa yeelay, waxaa qoran, Waa inaad wax shar ah kaga hadlin nin dadkaaga u taliya.

23:1

NASB, NRSV

“aad u fiiriyey”

NKJV

“aad u eegay”

TEV

“si aada u eegay”

NJB

“aad u fiiriyay”

Eeg sharraxa 1:10. Luukos ereygan marar badan ayuu aad u adeegsanayaa. Halkanna waxa uu ugu adeegsanayaa Bawlos. Bawlosna waxa uu ku isticmaalayaa oo keliya II Korintos. 3:7,13.

▣ “shirka” Eeg Mawduuca Gaarka ah: Sanhedrinka 4:5.

▣ “Walaalayaalow” Bawlos Yuhuudda waxa uu ugu yeedhayaa “walaalo” marar badan (13:26,38; 22:1,5; 23:1,5,6). Yuhuudduna waxay Bawlos ugu yeedheen walaal 13:15. Ananiyas na waxa uu ugu yeedhayaa walaal 9:17, sida kaniisadda Yerusaaalemba ay samaynayso 21:20.

i kastaba ha ahaatee, rumaystayaasha Yuhuudda waxa iyagana lagu magacaabay magacan (e.g., 9:30; 10:23; 11:1,12; 12:17; 15:3,7,13,22). Ereygani waxa uu la xidhiidhaa “xer” sida ku xusan 11:29; 18:27. Sidoo kale waxa loo isticmaalay rumaystayaasha Giriigga sida ku sagan 16:2,40. Haddaba ereygan waxa uu koobsan karaa macnoyaal badan waxaanu la xidhiidhi karaa koox gaar ah.

▣ **“ilaa maalintan ayaan qalbi wanaagsan ku noolaa Ilaah hortiiis”** Waa falka dhammayska tiran oo wax tusmaynaya ee *politeuo*. Ereygan waxa la adeegsaday isaga oo la xidhiidha muwaadin(cf. Filiboy. 1:27). Bawlos waxa uu sheegayaa in lasii daayay isaga oo ka tirsan Yuhuudda isla markaasna Ilaah hortiiis ku ah mid wanaagsan.

▣

NASB **“qalbi wanaagsan”**
NKJV **“qalbi wanaagsan oo kasta”**
NRSV **“dareen cad”**
TEV **“qalbigaygu waa caddaan”**
NJB **“qalbi wanaagsan oo cad”**

Bawlow waxa uu isticmaalayaa ereyga “qalbi fiican” marar badan warqadaha Korintos dhexdooda (cf. 4:4; 8:7,10,12; 10:25,27,28,29; II Korintos. 1:12; 4:2; 5:11). Waxa ay tusinaysaa waxa habboona iyo waxa aan habboonayn anshax ahaan (cf. Fal 23:1). Qalbi wanaagga waxa saamayn kara nolosheennii hore, doorashadeenna, ama Ruuxa Ilaah. maaha hanuun wanaagsan, laakiinse waxa ay tusinaysaa xadka qofka iimaankiisa.

Haddaba, qalbigeenna oo aan xumaynaa, xitaa hadii ay tahay khalad ama taag darro, waxa weeyi dhibaato muhiima oo ku timaadda iimaanka. Qalbi wanaagga rumaystuhu waxa uu u baahan yahay hagitaan ka yimaadda Ilaah iyo Ruuxa Ilaah (cf. I Timoteyos. 3:9). Ilaah waxa uu xukumi doonaa rumaystayaasha (i.e., taag daran ama xooggan, cf. Rooma. 14:1-15:13) iyadoo taasina ku iman doonto iftiinka ay haystaan, laakiin dhammaanteen waxaan u baahi qabnaa in aan u furnaano Kitaabka iyo Ruuxa, si aan u helno iftiin dheeraad ah iyo ku koritaanka garashada Rabbi Ciise Masiix.

▣ **“ilaa maalintan Ilaah hortiiis”** Bawlos sidan oo kale waxa uu ku sheegayaa II Korintos. 1:12; II Timoteyos. 1:3. Waxa uu qiranayaa doonistiisa (cf. Rooma. 7:23, gaar ahaan aayadda. 7). Dooddiisa fiqi ahaaneed ee ku sugan Rooma1-8 waxay ku salaysantahay sida qof waliba uu u fawdeeyo sharciga iyo damiirkiisa (cf. 3:9-23; 4:15; 5:20).

23:2 “wadaadkii sare oo Ananiyas” Luqada Cibraaniga magaciisu waxa uu ku noqonayaa Hananiah. Kani maaha Ananiyas ka ku sugan Luukos 3:2, Yooxanaa 18:13, ama Fal 4:6, laakiin waa mid mar danbe ah (Ananiyas, ina Nebedeyos) oo uu magacaabay Herodos Chalcis, oo xukumayay C.D. 48-59 (Josephus, *Antiq.* 20.9.2).

Qoraallada Josephus waxbadan ayay inooga sheegayaan Wadaadkan Sare.

1. Markii uu noqday Wadaadka Sare, *Antiq.* 20.5.2; *Wars*, 2.12.6.
2. Markii isaga iyo wiilkiisa (Ananus) loo diray Rooma, *Antiq.* 20.6.2
3. Markii qolo kacdoon wataa dishay isaga iyo walaalkiis, *Wars* 2.17.9

Josephus waxa uu waxyaalo badan wax ka qoray dhacdooyinka Yuhuudda iyo kuwii shakhsi ahaaneed ee Falastiin.

▣ **“inay afka ku dhufaan”** Waxay ahayd cay (cf. Yooxanaa 18:22).

23:3 “Ilaah baa kugu dhufan doona,” Middani iyadoo faahfaahsan waxay ku xusan tahay Josephus, *Wars* 2.17.9.

▣ **“kaaga derbi caddaysanow”** Lama hubo waxa uu Bawlos uga jeeday.

1. Yuhuuddu waxay middan ku shabahi jireen labo wejiilanimada (cf. Matayos. 23:27)
2. Waxa laga yaabaa inay u noqonayso Yexesqeel. 13:10-15

▣ **“sharcigu lahayn”** Waxa laga yaabaa inay u noqonayso Laawiyiintii. 19:15. Sidoo kale eeg Yooxanaa 7:51.

23:5 “Walaalayaalow, anigu ma aan garanaynin inuu wadaadkii sare yahay” Aragtiyaha ku saabsan Bawlos oon garanayn waxa ay yihiin

1. araggiisa oo daciif ahaa
2. isaga oon garanayn waayo sanado badan ayuu Bawlos ka maqnaa Yerusaaalem.
3. muu garanayn Wadaadka Sare waayo muu xidhinayn maryihiisa

4. muu garanayn cidda hadashay
5. waxyaalaha uu sameeyay oon haboonayn (i.e., dheel dheel)

☐ **“waxaa qoran”** Bawlos waxa uu tusinayaa inuu garanayo isla markaana uu tix gelinayo Sharciga isaga oo soo xiganaya Baxniintii. 22:28.

NASB (UPDATED) TEXT: 23:6-10

⁶Laakiin Bawlos markuu gartay in dadka qaarkiis Sadukiin yahay, qaarka kalena ay Farrisiin yihiin, ayuu shirkii ka dhex qayliyey oo yidhi, **Walaalayaalow, anigu waxaan ahay Farrisi oo ah Farrisiinta wiilkood, oo wax ku saabsan rajada iyo sarakicidda kuwii dhintay ayaa laygu xukumayaa.** ⁷Oo markuu sidaas yidhina, waxaa Farrisiintii iyo Sadukiintii ka dhex dhacay muran, ururkiina waa kala qaybsamay. ⁸Maxaa yeelay, Sadukiintu waxay yidhaahdaan, **Ma jiraan sarakicidda ama malaa'ig ama ruuxba; laakiin Farrisiintu kulligoodba way qirtaan.** ⁹Markaasaa waxaa dhacay buuq weyn. oo qaar ka mid ah culimadii safka Farrisiinta ayaa istaagay iyagoo hadal ku dagaallamaya oo leh. **Ninkan wax shar ah kama helin; laakiin haddii ruux la hadlay isagii ama malaa'ig la hadashay, Ilaah la dagaallami mayno.** ¹⁰Oo markii muran weyni dhacay, ayaa sirkaalkii sare wuxuu ka cabsaday inay Bawlos kala jeexjeexaan, markaasuu askartii ku amray inay hoos tagaan oo xoog isaga uga soo qaadaan dadka dhexdiisa, oo ay qalcaddii keenaan.

23:6 “gartay” Bawlos waxa uu rumaystay in aanu dhegaysan karin wadaadkan sare ee Sadukiga ah.

☐ **“Sadukiin”** Ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 4:1.

☐ **“Farrisiin”** Bawlos waxa uu ahaa Farriisi (cf. 26:5; Filiboy. 3:5-6) qoyskiisuna waxa uu ahaa Farriisi. Ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 5:34.

☐ **“oo wax ku saabsan rajada iyo sarakicidda kuwii dhintay”** Bawlos waxa uu taabtay arrinta fiqi ahaaneed ay Sadukiinta iyo Farrisiintu isku khilaafsanaayeen. Sadukiintu waxay diiddanaayeen nolosha ka danbaysa dhimashada, halka Farrisiintuna ay ka rumaysnaayeen (cf. Ayuub 14:14; 19:23-27; Ishacyaah. 25:8; 26:19; Daanyeel. 12:2). Tanina waxay ahayd arrinta u dhaxaysay labada kooxdood (cf. aayadaha. 7-10).

23:7 “ururkiina waa kala qaybsamay.” Ereygan macnihiisa asaasiga ahi waa “kala qaybsamid” (cf. Luukos 5:36; 23:45). Waxa loo adeegsaday kala qaybsanaanta u dhaxaysa labo kooxood (cf. Fal 14:4; 23:7). Kala qaybsanaanta u dhaxaysa labadan kooxood ee Yuhuudda ahi waxa uu ahaa mid marwalba jiray. Bawlsona dabkii ayuu huriyay.

23:8 “ama malaa'ig ama ruuxba” Aayadda 8 waxa weeyi faallo uu bixinayo Luukos. Weedhani haddaba ma waxay tusinaysaa labo nooc oo ruuxi ah ama mid keliya? Labadaba asalkoodu kitaabi ahaan waxa uuu koobsanayaa macnoyaal badan, laakiin Cibraaniyada 1:5, 13, iyo 14 ayaa sheegaysa in ay isku mid yihiin.

Sadukiintu waxay diiddanaayeen jiritaanka sharka iyo khayrka. Farrisiintuna waxay qaateen fikirka Axdiga Hore waxaanay xitaa horu mariyeen bidco ku saabsan jinka iyo malaa'igaha (toddobo hoggaamiye mid kasta). Marjica ugu wanaagsan ee aan ka helay waxyaalaha khuseeya Yuhuuddii qarnigii koobaad waxa aan ka helay Alfred Edersheim, *The Life and Times of Jesus the Messiah*, Appendix XIII.

23:9

NASB	“Markaasaa waxaa dhacay buuq weyn”
NKJV	“waxa dhacday qaylo badan”
NRSV	“waxaana dhacay buuq badan”
NJB	“buuqii wuu sii kordhay”

Weedhan oo kale waxa laga helayaa Sabtuujantiga Baxniintii. 12:30 (sidoo kale u fiiro Baxniintii. 3:7; 11:6; Esteer. 4:3; Ishacyaah. 58:4; 65:19). Ereyga “oohin” (*kraug*) waxa uu sidoo kale ku suganyahay Matayos. 25:6; Luukos 1:42; Efesos. 4:31; Cibraaniyada. 5:7; Muujintii. 21:4. Macnaha tuduca oo keliya ayaana xadidi kara buuqa “oohinta” (wanaag ama dhinaca xun). Ereyga kale ee caadifadda ah “la diriro” (*diamachomai*) ayaa sidoo kale lagu dhex isticmaalay LXX ka Daanyeel. 10:20. Faallada Bawlosna waxa ay sababtay buuq iyo caadifad oo ahayd waxa uu rabay!

▣ **“culimadii”** Waxay khabaro ku ahaayeen sharciga kiisa afka lagu hayo (Talmud) iyo ka qoran (Axdiga Hore). Badankooduna waxay ahaayeen Farrisiin.

MAWDUUC GAAR AH: CULIMO

Magacu waxa uu ka imanayaa magac Cibraanig ah (BDB 706) kaasi oo loogala jeedo “fariin lagu hadlay” “qoraal qoran.” Tarjumaadda Giriigga “grammateus” hadiyo goor waxa ay tilmaamaysaa fariin qoran. Waxa ay tusin kartaa

1. aqoon yahahan (Nexemyaah 8)
2. sarkaal dowladeed (II Boqorradii. 22:3-13)
3. diiwaan geliye (I Taariikhadii. 24:6; II Taariikhadii. 34:13; Yeremyaah. 36:22)
4. sarkaal milatari (cf. Xaakinnadii. 5:14)
5. hoggaamiye diimeed (Cesraa 7:6; Nexemyaah. 12:12-13)

Axdiga Cusub dhexdiisa waxa ay badanaa la xidhiidhaan Farrisiinta. Dhinac marka laga eego waxay ahaayeen dad aqoon u leh Axdiga Hore iyo Dhaqanka (Talmud). Waxa ay gacan ka gaysteen in dhaqanka Yuhuudda ay ku dabaqaan nolol maalmeedka (cf. Sirah 39:6). Si kastaba ha ahaatee, xaqnimadoodu (i.e., sharciyada diinta Yuhuudda) may keeni doonin nabad ay Ilaah la yeeshaan (cf. Matayos. 5:20; Rooma. 3:19-20; 9:1-5,30-32; 10:1-6; Kolosay. 2:20-22).

Waxa marar badan lagu dhex sheegay Injiillada (Yooxanaa laakiin ma sheegayo marnaba, 8:3 maaha asal), iyaga oo kasoo horjeeday Ciise, inkasta oo qaar ay u jawaab celiyeen (cf. Matayos. 8:19).

1. khilaafka ku salaysan wax la cunista denbiilayaasha iyo cashuur qaadayaasha, Markos 2:16; Matayos. 9:9-13
2. khilaafka ku salaysan awoodda Ciise u leeyahay jinni saarista, Markos 3:22
3. khilaaf ku salaysan Ciise oo denbiga dhaafa, Matayos. 9:3; Luukos 5:21
4. dalbashada calaamo layaab leh, Matayos. 12:38
5. khilaaf ku saabsan gacmo dhaqista (i.e., maydhishada), Matayos. 15:1-2; Markos 7:1-5
6. khilaaf ku salaysan galitaanka Yerusaleem Matayos. 21:15
7. Ciise oo ku eedeeyay waxa ay ujeedadoodu tahay (i.e., raadinta sharaf iyo wanaag), Markos 12:38-40
8. Ciise oo iyaga ku eedeeyay labo wejiilanimo iyo indho la'aan, Matayos. 23:1-36

Aqoonta ay u leeyihii Qorniinka aawadiis, waxay ahayd ugu horrayn inay aqoonsadaan Ciise, laakiin dhaqamadda (cf. Ishacyaah. 29:13; 6:9-10) ayaa indho tiray. Marka iftiinku uu noqdo mugdi waxa sii kordhaya mugdihii!

▣ **“Ninkan”** Adeegsiga magacani macnaha waxa uu ku tusinayaa in aanay ahayn dhinaca xun.

▣ **“laakiin haddii”** Waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah oo aan dhamaystirnayn. Culimadani waxay sheegayeen in Bawlos uu arkay arrin ruuxi ah, laakiinse aanay iyagu hubin. Soo dhex galistooda iyo difaacitaanka ay Bawlos ku difaacayaan waxa uu tusinayaa sida ay kooxdooda u difaacayeen. Dhinaca kale Sadukiinta waxya ka jeclaayeen Farriisi mucaarad ah.

Maadaama oo middani ay tahay qaab naxwe oo aan dhammays tirnayn, Textus Receptus ka ayaa isagoo raaccaya qoraal gacmeedyada Giriigga ah ee H, L, iyo P, waxa uu ku darayaa, “yannaan Ilaah la dagaallamin,”kaasi oo lagasoo qaatay Fal 5:39.

23:10 “ku amray inay hoos tagaan oo xoog isaga uga soo qaadaan dadka dhexdiisa” Laba jeer ayaa imika xukuumadda Roomaanku Bawlos noloshiisa ku dhex badbaadisay Yeruusaalem. Layaabna malaha in Bawlos uu dawladda u arkay kuwo u adeegaya Ilaah (cf. Rooma 13). Waxa laga yaabaa in middani ay la xidhiidho “ka amarka leh” sida ku sugan II Tesaloniika. 2:6-7.

NASB (UPDATED) TEXT: 23:11

¹¹Haddaba habeenkii dambe Rabbiga ayaa isag taagay isagii oo ku yidhi, Kalsoonow, maxaa yeelay, sidaad Yeruusaalem iigu markhaati furtay waa inaad Roomana iigu markhaati furtid.

23:11 “Rabbiga ayaa is ag taagay isagii” Halkan waxa ku sugan riyo kale oo dhiirri gelin u ah Bawlos (cf. 18:9-10; 22:17-19; 27:23-24). Bawlos muu ahayn nin ay ka maqantahay niyad jabka iyo shakiga.

☐ “Kalsoonow,” Waa fal wakhti xaadirka jooga oo amar ah. Eraygan halkan oo keliya ayaa lagaga dhex isticmaalay qoraallada Luukos. Bawlos waxa laga yaabaa in middan uu la wadaagay Luukos, Ciisena ereygan marar badan ayuu isticmaalay (cf. Matayos. 9:2,22; 14:27; Yooxanaa 16:33).

☐ “waa inaad Roomana iigu markhaati furtid” Waxay ahayd doonista Ilaah in Bawlos la xidho si loo horgeeyo Kaysar. Injiilkana waxa lagu wacdin doonay Rooma (cf. 19:21; 22:21)! Wax ku saabsan “waa inaad” ka eeg sharraxa buuxa ee 1:16.

NASB (UPDATED) TEXT: 23:12-15

¹²Oo markii ay maalin noqotayna, ayaa Yuhuuddii urur samaysteen oo nidar wada galeen iyagoo leh, Waxba cuni mayno, waxbana cabbi mayno ilaa aan Bawlos dilno mooyaane. ¹³Kuwa isku dhaartayna waxay ka badnaayeen afartan ¹⁴Markaasay u yimaadeen wadaaddadii sare iyo waayeelladii, oo waxay ku yidhaahdeen, Nidar weyn ayaannu wada galnay, oo waxaannu isku dhaarsannay inaannan waxba dhadhamin ilaa aannu Bawlos dilno. ¹⁵Haddaba idinka iyo shirkuba waxaad sirkaalka sare garansiisaan inuu isagii idiin keeno sidii idinkoo doonaya inaad aad u sii garataan waxyaalaha ku saabsan isagii; annaguna, intuusan soo dhowaan, diyaar baannu nahay inaannu dilno isagii.

23:12-15 Sadarkani waxa uu inagu wargelinayaa shirqoolka ay damceen kuwo Yuhuudda ka mid ahi. Waxa weeyi dil ay rabeen in ay gaystaan (cf. aayadda. 21) sidii mid Yuhuudi ahiba ugu qorshaystay Ciise.

23:13 “axay ka badnaayeen afartan” Afartanku waxa uu ahaa tiro Yuhuuddu si dadbanugu adeegsan jireen wakhti aan qeexnayn, laakiin halkan waxa loogu isticmaalya shakhsiyaad, sidaasi darteedna waa suugaan ahaan. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3.

23:14 “wadaaddadii sare iyo waayeelladii” Waxay ahayd si loo soo gaabiyo sheegista Sanhadriinka. Ka eeg Mawduuca Gaarka ah 4:5.

☐
NASB “Nidar weyn ayaannu wada galnay”
NKJV “waxa aanu galnay nidar wayn”
NRSV “waxa aanu si adag u galnay nidar”
TEV “waxa aanu qaadanay nidar wayn”
NJB “waxa aanu samaynay nidar wayn”

Tarjumaadaha Ingiriisidu waxay isku dayayaan inay tarjumaan weedh duur xul ah, “iyadoo inkaari dushayada ahaatay.” Kuwan nidar galayaasha ahi may dilin Bawlos, waxa aanan ka yaabanahay haddii ay gaajo u dhinteen. Dhinaca kale dhaqanku waxa uu oggolaay in la iska daayo nidarka ku saabsan dhiigga. Eeg Mawduuca Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: HABAARKA (ANATHEME)

Waxaa jira dhowr erey oo ah “habaarka” afka Cibraaniga dhexdiisa. *Herem* waxaa loo adeegsaday wax la siiyey Ilaah. (cf. LXX sida anathema, Laawiyaantii 27:28), aalaaba xagga burburka (cf. Sharciga ku noqoshadiisa 7:26; Yashuuca 6:17-18; 17:12). Waa erey loo adeegsaday ujeedka “dagaalka qudduuska ah.” Ilaah wuxuu sheegay in buburinta Kancaaniyiinta iyo Yeriixoo ay ahayd fursadda ugu horraysa, “miraha ugu horreeya.”

Axdiga Cusub dhexdiisa *anathema* iyo sida uu qaabkeedu ula xiriiro waxaa loogu isticmaalay darreeno kala duwan oo dhowr ah.

1. Sidii hadiyad ama alla bari Ilaah loo bixinayo (cf. Luukos 21:5)
2. Sidii dhimasho ama ballan (cf. Falimaha Rasuullada 23:14)
3. In la inkaaro oo la dhaarto (cf. Markos 14:71)
4. Qaabkii uu ay inkaarto ula xiriirtay Ciise (cf. I Korintos 12:3)
5. In qof ama shay loo bixiyo beddelkii ciqaabta iyo burburka Ilaah (cf. Rooma 9:3; I Korintos 16:22; Galatiya 1:8-9).

NASB (UPDATED) TEXT: 23:16-25

¹⁶laakiin Bawlos wiilkuu abtiga u ahaa wuxuu maqlay gaadmoodii, markaasuu yimid oo qalcaddii galay oo Bawlos u warramay. ¹⁷Markaasaa Bawlos wuxuu u yeedhay boqol-u-taliyayaashii midkood oo ku yidhi, Wiilkan u gee sirkaalka sare, maxaa yeelay, war buu qabaa inuu u sheego. ¹⁸Sidaas daraaddeed ayuu kaxeeyey oo u geeyey sirkaalkii sare oo ku yidhi, Bawlos oo maxbuuska ah ayaa ii yeedhay, oo wuxuu i weydiistay inaan kuu keeno wiilkan oo u ar qaba inuu kuu sheego. ¹⁹Markaasaa sirkaalkii sare gacanta ku qabtay isagii oo gees ula leexday oo gooni ahaan u weydiyey isagoo leh, Waa maxay warraad qabtaa inaad ii sheegtid? ²⁰Markaasuu ku yidhi, Yuhuuddu waxay ku heshiiyeen inay kuu weydiistaan inaad berrito Bawlos shirka hor keentid sidii adigoo doonaya inaad u sii weydiisatid wax ku saabsan isagii. ²¹Haddaba yaanay ku oggolaysiin: maxaa yeelay, waxaa isagii gaadaya kuwa ka badan afartan nin oo iyaga ka mid ah, kuwaasoo nidar galay inayan wax cunin, waxba cabbin ilaa ay isaga dilaan; haddana diyaar bay yihiin, iyagoo ballanqaad kaa filanaya. ²²Haddaba sirkaalkii sare wiilkii buu iska diray isagoo ku amraya oo leh, Ninna ha u sheegin inaad waxyaalahan ii muujisay. ²³Markaasuu wuxuu u yeedhay laba ka mid ah boqol-u-taliyayaashii oo ku yidhi, Waxaad diyaarisaan inay saddexda saacadood oo habeennimo tagaan ilaa Kaysariya laba boqol oo askar ah iyo toddobaatan fardooley ah iyo laba boqol oo warmoolay ah. ²⁴Wuxuu kaloo ku yidhi, Keena neefaf ay Bawlos fuuliyaan oo nabad isaga ugu geeya taliye Feelikos. ²⁵Markaasuu qoray warqad sidan ah:

23:16 “Bawlos wiilkuu abtiga u ahaa” Waxa jira su’aalo badan oo ku saabsan qoyska Bawlos, laakiinse waa laga gaabsaday. Sida uu qorshaha u oгаа lama garanayo, waxaana sidoo kale laga yaabaa inuu ahaa Farriisi.

23:21 Weerarkani sidoo kale waxa uu koobsanayay dilista ilaalada Roomaanka!

23:23 Ciidanka Bawlos raacay waxa ay noqon kareen mid ahaan (1) 200 askari, 70 fardooley, iyo 200 warmoolay (2) 200 warmoolay iyo 70 askar ah. Qoraal gacmeedyada Giriigga ee galbeedku wax ayay ku darayaan (cf. NKJV).

☐ **“saddexda saacadood”** Waxa weeyi wahtiga Roomaanka. Waxay ka tirin jireen habeenka 6 p.m. Tanina waxay noqonaysaa 9 p.m.

☐ **“Kaysariya”** Waxa ay ahayd xarunta looga taliyo ciidammada Roomaanka ee ku sugnaa Falastiin.

☐

NASB, NKJV,

NRSV, TEV	“warmooley ah”
NJB	“hubaysan”
REB	“ciidammo hubaysan”
NASB (footnote)	“dheeraad ah” ama “koox xayawaan ah”
NEB	“qaansoolay”

Macnaha ereyga *dexiolabos* lama hubo. Macnaha caadiga ahi waa “mid ka ciidamaysan dhinaca midig” (*dexios*). Waxa ay tilmaamaysaa

1. nooc ka mida askari habaysan (qaanso ama waran)
2. ka maxaabiista garab gala
3. mid haya faras labaad
4. mid ku sogan dhinaca

Ikhtiaarrada qaar ayaa tusinaya in mucaasiriintu aanay macnaha saxda ah.

23:24 “Feelikos” Taariikhyahanka Roomaanka ah ee Tacitus (*Histories* 5:9, *Annals* 12:54) ayaa ku magacaabay Antoniyos Feelikos axmaq aan naxariis lahayn. waxa uu booskiisa ku helay walaalkiis Pallas (labaduba waxay ahaayeen addoomo la xoreeyay), oo ahaa saaxiibo ka ag dhow Boqor Kalowdiyos. Waxa uu ahaa taliyihii koob iyo tobnaad ee Falastiin sanadihii C.D. 52-59.

23:25 “sidan ah” Eeg Mawduuca Gaarka ah 7:43.

NASB (UPDATED) TEXT: 23:26-30

²⁶Kalawdiyos Lusiyas wuxuu salaamayaa taliyaha sharafka weyn leh oo Feelikos ah. ²⁷Markii Yuhuuddu qabatay ninkan oo ay u dhowaayeen inay dilaan, ayaan askar la imid oo bixiyey. markaas ogaaday inuu reer Rooma yahay. ²⁸Anigoo doonaya inaan ogaado sababtii ay ku dacwaynayeen, ayaan isagii shirkoodii hor keenay; ²⁹kaasoo aan markaas gartay inay isaga ku dacweeyeen su'aalo ku saabsan sharcigooda. Laakiin inaan lagu ashtakaynaya wax uu ku istaahilo in la dilo ama in la xidho. ³⁰Haddaba markii la ii sheegay in loo heshiiyey in ninkii la gaadi doono, ayaan dhaqso kuugu so diray isagii, anigoo ku amraya kuwii soo dacwaynayay inay hortaada ku dacweeyaan isaga.

23:26-30 Tani waxa weeyi warqadda sharraxaysa xaaladda Bawlos oo uu qoray sirkaalka xukumayaa (cf. 25:12ff). waxa ay sheegaysaa sida ay wax u dhaceen, laakiin sidani miyay u eegtahay in Lusiyas uu wanaagsan yahay.

23:26 Aayaddani waa ta la inoogu sheegay magaca taliyaha.

23:29 Aayaddani waxay tusinaysaa Luukos oo tusinaya in Masiixiyadda iyo hoggaamiyayaasheedu marka lagu hor dacweeyo xukuumadda ay ahaayeen kuwo denbi aan lahayn. Rooma may ahayn in ay ka cabsato “Jidka”!

NASB (UPDATED) TEXT: 23:31-35

³¹Sidaas daraaddeed ayaa askartii. sidii lagu amray. Bawlos kaxeeyeen, oo habeennimo keeneen Antibatris. ³²laakiin maalintii dambe ayay fardooleydii daayeen inay isaga sii raacaan, iyaguna waxay ku noqdeen qalcaddii; ³³kuwaasu markay Kaysariya yimaadeen oo ay warqaddii u dhiibeen taliyaha, ayay Bawlos hor taageen isagii. ³⁴Markuu akhriyeyna. wuxuu weydiiyey gobolkii uu ka yimid; oo kolkuu ogaaday inuu Kilikiya ka yimid. ³⁵ayuu wuxuu ku yidhi. Waan maqli doonaa dacwadaada markii kuwii ku dacwaynayay yimaadaan: markaasuu ku amray in lagu hayo gurigii taliyaha.

23:31 “oo habeennimo keeneen Antibatris” Magaaladan waxa dhisay Herodos kii Waynaa, waxaanu magacaabay kaddib aabbihiis Antipater II. Waxay ahayd masafo dheer oo kudhowaad ah 30-40 mayl. Magaaladu meesha saxda ah ee ay ku taallay lama hubo. Haddaba, sababta ay askartu usoo laabteen (aayadda 32) markii halkan la gaadhay waxa weeyi sababtoo ah

1. waxa ay ahayd meel ay ku nool yihiin dad aan Yuhuud ahayni.
2. Waxa ay ahayd meel khatarteeda iyo weerarkeedu yaryahay.

23:33 “taliyaha” Waxa weeyi “xaakinka. Luukos waxa uu sheegayaa magacyada ama martabadaha askarta Roomaanka.

23:34 “wuxuu weydiiyey gobolkii uu ka yimid” Waxa weeyi garashada meesha uu kasoo jeedo. Maadaama oo Bawlos uu kasoo jeeday Gobolka Boqortooyo ee Feelikos waxa uu isku dayi karaa kiiska. Waxa jiray saddex nidaam caddaaladeed oo ay lahayd Boqortooyada Roomaanku:

1. Boqortooyo (Kaysar)
2. Gudi
3. Hoosaad (sida Herodos)

23:35 “markii kuwii ku dacwaynayay yimaadaan” Waxa ay ahaayeen Yuhuuddii reer Aasiya kuwaasoo Bawlos ku eedeeyay inuu Macbadka soo geliyay kuwo aan Yuhuud ahayn. xaqiiqada ah in aanay joogin ayaa waxay keentay laabitaanka kiiska. Laakiin sida badanaa dhacda, siyaadda hoose waxay saamaysaa caddaaladda!

▣ **“in lagu hayo gurigii taliyaha”** Roomaanku way u dabacsanaayeen Bawlos intii uu la joogay (cf. 24:23). Bawlosna waxa uu joogay meel uu dhisay Hereodoskii Waynaa, oo hore u ahayd meesha uu isagu shakhsi ahaan deganaa, laakiinse hadda noqotay xarunta ugu sarraysa ee Roomaanka.

SU’AALO FALQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Isbarbar dhig is difaacista Bawlos oo qor waxyaalaha ay wadaagaan.
2. Bawlos miyuu isku arkayay Yuhuudi iimaan leh?
3. Miyaan Falimaha Rasuullada karnaa faahfaahinta qoyska Bawlos?

FALIMAHA RASUULLADA 24

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Arrin Bawlos loogaga soo hor jeedo	Kusoo Eedayntii Fallaagonimada	Bawlos oo Feelikos hor taqagan	Arrin Bawlos loogaga soo hor jeedo	Arrinkii oo Feelikos hor yaalla
24:1-9	24:1-9	24:1-2a 24:2b-8 24:9	24:1-2a 24:2b-9	24:1-9
Bawlos oo Feelikos Hortiisa isku Difaacaya	Isku Hor Difaaciddii Feelikos		Bawlos oo Feelikos isku Hor Difaacaya	
24:10-21	24:10-21	24:10a 24:10b-21	24:10a 24:10b-16 24:17-21	24:10a Bawlos Hadalkiisii Taliyihii Roomanka ahaa Hortiisa 24:10b-13 24:17-21
24:22-23	24:22-27	24:22-23	24:22-23	24:22-23
Bawlos oo Xabsiga Loo Taxaabay			Bawlos oo hor Taagan Feelikos iyo Darusilla	
24:24-26	24:24-26	24:24-26	24:24-26	24:24-26
24:27	24:27	24:27	24:27	24:27

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDEEDA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA EREYGA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 24:1-2a

¹Kolkaasaa shan maalmood dabadeed waxaa yimid Ananiyas oo ahaa wadaadkii sare oo wata kuwo waayeellada ah iyo mid codkar ah oo Tertullos la odhan jiray; oo waxay taliyihii u sheegeen wax Bawlos ka gees ah. ²Oo markii loo yeedhay ayaa Tertullos wuxuu bilaabay inuu isagii dacweeyo, oo wuxuu yidhi.

24:1 “Ananiyas oo ahaa wadaadkii sare” Ka eeg sharraxa buuxa ee 23:2. Wow! Wadaadka sare qudhiisa ayuaa ka yimid Yerusaaalem oo u socda Kaysariya. Bawlos runtii qodax ayuu jidhkooda ku ahaa!

▣ “**usoo degay**” Xagga Yuhuudda, Yerusaaalem waxa ay saarnayd taag sare,, deegannada kalena waa ay hooseeyeen.

▣ “**waayeellada**” Axdigii Hore dhexdiisa tani waxa ay tilmaamaysay hoggaaliyeyaasha qabiillada. , kawa saamaynta ku lahaa Yerusaaalem. Sida badan Axdiga Cusub dhexdiisa Sanhedrin waxaa loogu qeexayaa “Wadaadka sare, kuwaw wax minguuriya, iyo waayeellada.” Ugu dhawaan waxaa jiray xubno ka Sanhedrin ka mid ah oo ahaa taageerayaasha Sudukiinta ahaa. Hoggaankii macbudka ayaa arkay dhibta xad-dhaafka ah markaasoo ay Faarisiintu ay xaadir ahaayeen (cf. 23:6-10).

▣ “**Tertullos**” Kani waxa uu ahaa qareen la kiraystay (doodaa) ama aftahan (cf. NKJV). Waa hab uu yahay ereyga Giriigga ah *r'ma*. Sida cad wuxuu dhacdadii Sanhedrin ka dhigay hab sharci ah oo ay Roomanku aqbali karaan sida macquulka ah iyadoo Laatiin ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 24:2b-9

^{2b} Adiga daraadda waxaannu ku raaxaysannaa nabad badan, oo dhaqaalahaaga aawadiisna xumaatooyinka waa laga hagaajiyaa quruuntan. ³Annaguna si walba iyo meel walba ayaannu ku aqbalnaa, adigan Feelikos ah oo sharafka weyn lahow. oo aad iyo aad ayaannu ugu mahad naqaynaa. ⁴laakiin si aanan kuu sii daalin, waxaan kaa baryayaa inaad raxmaddaada nooga maqashid dhawr eray. ⁵ Maxaa yeelay, waxaannu aragnay in ninkanu yahay nin baas oo fidmad ka dhex kiciya Yuhuudda dunida jooqta oo dhan. waana kan horgalaha u ah dariiqada Naasaraaniyiinta: ⁶oo wuxuu aad ugu dadaalay inuu macbudka nijaaseeyo; oo weliba annagu waan soo qabannay isagii, oo waxaannu ku xukumi lahayn wax sharcigayaga ku saabsan. ⁷laakiin waxaa yimid sirkaalkii sare oo Lusiyas la yidhaahdo, oo gacantayada xoog kaga baxshay isagii, ⁸oo wuxuu kuwii soo dacwaynayay ku amray inay hortaada yimaadaan. Isaga markaad adiga qudhaadu imtixaantid waad ka ogaan kari doontaa waxyaalahan aannu isaga ku dacwaynayno oo dhan. ⁹Oo Yuhuuddiina way ku darmadeen dacwadii iyagoo adkaynaya in waxyaalahaasu saas yihiin.

24:2b-4 Hordhacani muusan ahayn oo qudha iskuday hadal fudud (dabcan sidii la rajaynayey), laakiin mid aan sal lahayn hubaashii. Feelikos wuxuu ahaa nin cadaw ah (cf. Tacitus, *Histories* 5.9 and *Annals* 12.2). Feelikos oo qudha ayaa booskiisa lahaa sababtuna waa walaalkiis Ballas aawadiis, oo wuxuu ahaa nin xor looga dhigay

Antonia (Marc Antony walaashiis), Kalwdiyas, boqorka hooyadii. Waxaa goortii dambe loo raray Nero codsi dadka ka yimid awgiis (cf. Josephus, *Wars* 2.12.8-13.7 iyo *Antiq.* 20.7.7-8.9).

24:2b “ku raaxaysannaa nabad badan” Qaar ayaa u maleeya in tani ay la xidhiidho iskudaygiisa uu ku joojinayo waxqabadyada Yuhuudda xagjirka ah ee loogu yeero *sicarii* (dagger men). Ka eeg Josephus’ *Wars* 2.13.2.

24:5 “waxaannu aragnay in ninkanu” Waa Luukos ujeedkiisa Falimaha Rasuullada ee uu Roomanka ugu muujinayo in eedaynada loogaga soo hor jeedo Masiixiyadda ay been yihiin. Taas weeye tan uu Luukos u diwaan geliyey muuqaallo badan oo uu saraakiisa Roomanka soo hor dhigay. Saddex shayu ayaa Bawlos lagu soo eedeeyay:

1. inuu yahay rabsho-sameeye yahay
2. inuu hoggaamiye u yahay garab cusub
3. inuu qalallase ku abuurayo macbudka



NASB “dugaag run ah”
NKJV “nin baas”
NRSV “wheel dilaa ah”
TEV “xanuun Qatar ah”
NJB “axmaq dhammays tiran”

Tani waxa ay ka imanaysaa ereyga macnihiisu yahay baas ama aaf (cf. Luukos 21:11). Sida ku jirta Axdiga Cusub ee (LXX) waxa uu ereygu leeyahay isla macnaha baas ana aaf, laakiin masaal ahaan qof loo adeegsan karo (cf. Maahmaahyadii. 19:25).

▣ **“dunida joogta oo dhan”** Tani hubaal tilmaamaysa sida adeeggii Bawlos uu waxtar uga yeeshay qurba-jooqta.

▣ **“kan horgalaha u ah”** Kani waa labo erey oo isku xidhan xagga Giriigga “koow” iyo “in loo istaago.” Waxaa lagu dhex adeegsaday Septuagint-ga sida ku qoran Ayuub 15:24, “Kabtan garaaddaha koowaad leh.” Meeshan oo qura ayuu Axdiga Cusub kaga qoran yahay oo gebi ahaanba lagama helayo qoraalkii waraaqaha Koine ee masar laga helay.

▣ **“dariiqada”** Ereyga *hairesis* waxaa asal ahaan loola jeedaa “kala qaybin” ama “koox” (macnaha rasmiga ahu waa, “in door la samaysto”). Waxaa u timid in ay yeelato soo jeedin diidmo ah, sida laga arki karo luuqadda in Ingiriisiga ereygiisa ah “heresy,” oo ka yimid ereygan Giriigga ah. Suddukiinta waxaa loo sheegayey ereygan sida ku jirta 5:17 iyo Faarisiinta sida ku jirta 15:5. Macnahan guud ee ku jira Falimaha Rasuullada, Bawlos waxa uu masiixiyadda diiradda u saarayaa in ay qayb ;lagama maarmaan ah u tahay rumaysadka iyo rajada taariikh ahaaneed ee Yuhuudda (cf. aayadda. 14).

▣ **“Naasaraaniyiinta”** Ereygani waxa uu tilmaamayaa raacayaasha Ciisaha reer Naasateet. Dadka qaar waxa ay ereygan ku sharraxayaan in uu ka yimid magaalada Naasareet qaar kalese waxa ay la xidhiidhinayaan *nezer* (BDB 666) ama “laan,” Magac uu Masiixu leeyahay (cf. Ishacyaah. 11:1; 53:2). Mawduuc gaar ah ka eeg: 2:22.

24:6 Ogsoonow eedaynta lagaga soo hor jeestay Bawlos isda ku jirta 21:28 ee ahayd in uu burburinayo macbudka, ayaa waxaa hadda loo beddelay “inuu isku deyay inuu burburiyo macbudka.” Sababta ay ku andacoonayeen ayaa mid liidata ahayd. Wacdiga Bawlos ayuu dhibka runta ahu ahaa.

24:7 Labada qaws ee ku jira NASB waxa ay muujinaysaa qoraal dheeraad ah oo muhiim ah oo ku jira MS E oo la helay (qarnigii siddeedaad) iyo dhowr qoraal oo kale oo yar-yar oo iyaguna bilowday qarnigii sagaalaad. Aqrinta dheer waxaa laga dhex helayaa NKJV. Tani waxa ay u muuqataa mid beddelaysa kan doonaya inuu Bawlos ka dhaawaco hoggaanka Yuhuudda ee ku jeeda Lusiyas. UBS4 waa uu ka saarayaa qaybta dheeradka ah waxa uuna

ku xadaynayaa qaybta gaaban (MSS P74, 8, A, D, xoogaa Luuqaddii Hore ee Laatiinka ah, Vulgate, Coptic, iyo qaybaha Joorjiya) in ay tahay “B” (ugu dhawaanm wax xaqiiq ah). UBS3 waa uu ku darayaa aqriska dheer wuxuuna ka dhigayaa “D” isagoo ku qiimaynaya (darajo sare oo shaki ah).

NASB (UPDATED) TEXT: 24:10-21

¹⁰Oo markii taliyuhu u gacan haadiyey inuu hadlo. ayaan Bawlos u jawaabay oo wuxuu yidhi. Anigu waan ogahay inaad sannado badan quruuntan xaakin u ahayd. sababtaas daraaddeed anigoo aad u faraxsan ayaan isdaafacayaa. ¹¹Adigu waad ogaan karaysaa inayan laba iyo toban maalmood ka badnayn kolkii aan Yerusaaalem caabudidida u tegey. ¹²Anigoo qof la doodaya ama dad badan kicinaya laygama helin ama macbudka ama sunagogyada ama magaalada. ¹³Kuumana ay caddayn karaan waxyaalihii ay imminka igu dacwaynayaan. ¹⁴laakiin tan baan kuu qiranayaa. inaan Ilaaha awowayaashayo ugu adeego sida Jidka ay yidhaahdaan dariiqo bidcinimo ah, anigoo rumaysan waxyaalaha sharcigu leeyahay oo dhan iyo waxyaalaha lagu qoray kitaabbadii nebiyada. ¹⁵Oo waxaan xagga Ilaah ka rajaynayaa waxyaalaha ay kuwan qudhooduba filanayaan, waana inay jiri doonto sarakicidda ay kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahayn soo sara kici doonaan. ¹⁶Tan ayaan ku dadaalayaa inaan had iyo goorba qabo qalbi aan xumaan u keenin xagga Ilaah iyo xagga dadba. ¹⁷Haddaba sannado badan dabadeed ayaan waxaan u imid inaan quruuntayda u keeno sadaqooyin iyo qurbaanno. ¹⁸Markaan kuwaas keenayay ayay macbudka iga heleen. anigoo daahirsamay, oo aan dad badan la joogin. oo aan buuq ku jirin, laakiin waxaa joogay kuwo Yuhuud ah oo Aasiya ka yimid. ¹⁹kuwaasoo ay waajib ahayd inay halkan hortaada joogaan oo ay i dacweeyaan haddii ay wax igu haystaan. ²⁰Haddii kalese nimankan qudhoodu ha sheegeen xaqdarradii ay igu heleen markii aan shirka hor istaagay. ²¹haddii ayan ahayn codkan keliya oo aan ku dhawaaqay mar kaan iyaga dhex taagnaa oo idhi, Wax ku saabsan sarakicidda kuwii dhintay ayaad maanta igu xukumaysaan.

24:10 Doodda Sanhedrin waxaa loo isticmaalay hordhac caadi ah (ugu dhawaan sidii dhaqan ahaan la filayey), oo sidaan oo kale, sameeyo Bawlos.

☐ **“difaac”** Waxaan heli karnaa ereyga Inmgiriisiga ah ee “apology” ama “apologetics” ereygan oo asal ahaan ka yimid erey Giriig ah. Asal ahaanna macnihiisu waa in si sharci ah uu uu si hadal ah isku difaaci karo maxkamadda dhexdeeda.

24:11-12 Bawlos wuxuu muujinayaa in wax-qabadyadiisii Yerusaaalem dhexdeeda ay wax ahaayeen laakiin laga doodi karo. Waxaa lagu eedeeyay inuu macbudka burburinayo, laakiin sida runta ah, waxa uu fulinayey adeeg la aqbali karo.

24:14 “Jidka” Kani waxa uu magic u ahaa Masiixiyiintii hore kaasoo qeexaya in Ciise uu yahay jidka Ilaah loo maro (Yooxanaa 14:6) iyo hab-nololeed is weheshi (cf. 9:2; 19:9,23; 22:4; 24:22 iyo dabcan sida ku jirta 18:25-26).

☐ **“inaan Ilaaha awowayaashayo ugu adeego”** Bawlos waxa uu aayaddan ku sheegayaa in waxa uu wacdinayo ee ku saabsan Ciise uusan carqalad gelinnayn Axdigii Hore. Ciise waa oofintii rajooyinkii iyo ballammadii reer Bani Israa’iil. Uma uu arko in Masiixiyaddu ay tahay wax cusun oo ka duwan laakiin oofintii Axdigii Hore (cf. Ciise sida ku jirta Matayos. 5:17-19).

☐ **“sharcigii. .nebiyadii”** Waxaa jira labo ka mid ah saddexda qayb ee sharciga Axdigii Hore:

1. Tawreed (Law) — Bilowgii – Sharciga Ku Noqoshadiisa
2. Nebiyadii
 - a. nebiyadii hore — Yashuuca - Boqorrada (intaan Ruut ka ahayn)
 - b. nebiyadii dambe — Ishacyaah - Malaakii (marka laga reebo Baroorashadii Yeremyaah iyo Daanyeel)
3. Qoraallada
 - a. megiloth — Ruut, Ester, Wacdiyaha, Gabaygii Sulaymaan, iyo Baroorashadii Yeremyaah

- b. suugaanka xigmadda ah — Ayuub, Sabuurrada, Maahmaahyadii
- c. xilligii masaafurinta ka horraysay — I & II Taariikhdi, Cesraa, iyo Nexemyaah

24:15 “waxaan xagga Ilaah ka rajaynayaa waxyaalaha ay kuwan qudhooduba filanayaan” Bawlos waxa uu tilmaamayaa in wax baridda dhaqankiisa diineed uu la mid yahay sida kan dacweeyayaashan (cf. v. 16), marka laga reebo aragtidiisa ku aaddan sare kicidda. Bawlos waxa uu isku dayayaa in naftiisa ku difaaco isagoo tusinaya in isku dhacyadii ku idlaadeen arrimihii fiqiga ee diinta Yuhuudda, kaasoo aysan Roomanku doonayn in lagu lug yeesho. Xagga :rajada” ka eeg: Mawduuca Gaarka ah: Rajo 2:25.

▣ **“waana inay jiri doonto sarakicidda ay kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahayn soo sara kici doonaan”** Tani waxa ay la xidhiidhaa fiqiga Faarisiinta, ee ma aha hoggaanka Sudukiinta ee macbudka. Josephus, *Antiq.* 18.1.3, xitaa wuxuu ku tilmaamayaa in qaar Faarisiinta ka mid ah ay diideen sarekicidda kuwa sharka leh (Aragtida casrigan ee burburka ka eeg Edward Fudge, *The Fire That Consumes*). Kitaabka waa ay ka buuxaan ujeedkan ku saabsan ee sare kicidda guud (cf. Ishacyaah. 25:8; Daanyeel. 12:2; Matayos. 25:46; Yooxanaa 5:29; Rooma. 2:6-11; Muujintii. 20:11-15). Bawlos wuxuu Masiixiyadda u arkay in ay oofin dabiici ah u tahay Axdigii Hore (cf. Matayos. 5:17-19).ub!

24:16 “Tan ayaan ku dadaalayaa inaan had iyo goorba qabo qalbi aan xumaan u keenin” Isla weedhan oo kale ayey ahayd tii aadka uga cadhaysiisay wadaadka Sare sida ku jirta 23:1-2. Bawlos waa uu ku soo celcelinayaa middan sida uu u joogo. Waxa ay la mid tahay wada hadalkiisa ku aaddan dadaalkiisa shaqsi ahaaneed sida ku jirta I Korintos. 9:24-27. Iscelinta uu ku wacdiyey Felixsida (cf. aayadda. 25) ma ahayn wax fudud in si guul ah lagu dhammayn karo ama was not an easy thing to accomplish ama a ku jirta Galatiya. 5:22 oo dabcan midda ugu muhiimsan taxa midhaha!

24:17 “waxaan u imid inaan quruuntayda u keeno sadaqooyin” Wax ku saabsan “sadaqada” Ka eeg Mawduuca gaarka ah: 3:2. Tani waxa ay dabcan tilmaamaysaa qaadhaanka ka yimid kaniisadaha dadka aan Yuhuudda ahayn ee ku socotay kaniisadda Yerusaaalem (cf. Rooma. 15:25-27; I Korintos. 16:1-4; II Korintos 8-9). Waxaa cajiib ah in aan lagu dhex sheegin 21:15ff. Waxaa dhici karta in tani ahy muujinayso in aan si hagaagsan looga wada helin kaniisadda Yerusaaalem dhexdeeda (eeg James D. G. Dunn, *Unity and Diversity in the New Testament*). Waa ay adag tahay in cunsuriyadda qotoda dheer xal loo helo xitaa rumaystayaasha dhexdooda.

▣ **“iyo qurbaanno”** Tani waxa ay tilmaamaysaa

1. soo af jariddii Bawlos cadawgiisii Naasaret (cf. 21:24)
2. waxa ka bixinta kuwa kale cadawyadooda Naasaret (cf. 21:24)

Maxaa yeelay weedhani waxa ay u muuqataa in naxwe ahaan la xidhiidho in “sadaqo” oo la keeno ay macquul tahay in ay la xidhiidho mayal adaygga Yuhuudda, ee aysan la xidhiidhin deeqaha kaniisadaha ka imanaya.

24:18 “Markaan kuwaas keenayay ayay macbudka iga heleen” Muxaadarada adeegga ee Yuhuuddu waxa uu ahaa bilaabiddii Yacquub iyo waayeelladda kaniisadda (cf. 21:17-26). Waxaa loola jeeday in ay lagu dejiyo rumaystayaasha Yuhuudda ah ee sharciga ee ku jira kaniisadda, laakiin sida dhabta ah, waxay rabashtay Yuhuuddii luuqadda Giriigga ku hadlaysay ee Aasiya ka timid.

24:18-19 “kuwo Yuhuud ah oo Aasiya ka yimid” Tani waa arrin muhiim ah in Bawlos uu isku difaaco (cf. aayadda. 19). Marqaatiyaashii kuwa wax dacweynayey maysan joogin! Kuwii Bawlos dacweynayey wax eedayn ah uma aysan hayn (cf. aayadda. 20)! Aasiya waa meel juquraafi ahaan loo tixraaco Yuhuudda ka timid koonfurta iyo galbeedka Turkiga, dabadeed waxaa loogu yeedhahy Aasiyada Yar.

24:19b “haddii” Tani waxa ahy tilmaamaysaa xaalad heerka afraad ah, waa waddo lagu tilmaamayo xaalad deg-deg ah oo ah mid laga qaaday sidii ay macquulka u ahayd.

A. T. Robertson, *Word Pictures in the New Testament*, bogga. 420, waxa uu ugu yeedhayaa xaalad isku dhafan oo gabaggabadoodu tahay heerka labaad (i.e., laakiin xaadir ma aha, aayadda. 19a). His *Grammar* (bogga. 1022) waxa uu u diwaan gelinayaa jumlado kale oo isku dhafan sida ku jirta Luukos qoraalladiisa (cf. Luukos 17:6 iyo Fal 8:31).

NASB (UPDATED) TEXT: 24:22-23

²²laakiin Feelikos oo aad u sii garanaya wax ku saabsan Jidka ayaa xaajadoodii dib u dhigay oo yidhi. Kolkii sirkaalka sare oo Lusiyas ah yimaado ayaan xaajadiinna dhammaan u garan doonaa. ²³Markaasuu boqol-u taliyihii ku amray in la ilaaliyo isagoo aan xidhnayn oo aan saaxiibbadiis laga joojin inay u adeegaan.

24:22 Sida cad Feelikos waxa uu maqlay wax ku saabsan Ciise iyo Masiixiyadda. Dabcan marka laga eego sida uu sarkaal Rooman u yahay waxa uu soo koobay xaaladda degaanka ee uu saxiixi lahaa. Feelikos afadiisu Yuhuud ayey ahayd (cf. aayadda. 24), taas macnaheeduna waxaa weeye in uu fursad waayoaragnimo in uu ogaado wax-baridda sharciga Yuhuudda. Waxddada waxaa loo aqoonsaday in ay tahay qayb ku jirta Sharciga Yuhuudda, sidaas daraaddeed, waxaa laga dhigay “sharci” diimeed oo laga oggol yahay Boqortooyada Roomanka.

24:23 Tani waxa ay muujinaysaa in Feelikos uusan Bawlos ula muuqan mid hanjabaad ku ah oo uu u oggolaaday xoogaa xoriyad iyo wax-qabad ah. Halkan mar kale, waa nin sirkaal Rooman ah oo aan masiixiyadda u arag dhibaato siyaasadeed. Sida hubaasha tani waxa ay ahayd mid ka mid ah ujeedooyinkiisa uu Injiilkiisa u qora!

NASB (UPDATED) TEXT: 24:24-27

²⁴laakiin dhawr maalmood dabadeed ayaa Feelikos yimid isagoo ay naagtiisa Darusilla oo Yahuudiyad ahayd la socoto. oo wuxuu u cid dirsaday Bawlos, oo wuxuu ka maqlay wax ku saabsan rumaysadkuu rumaystay Ciise Masiix. ²⁵Oo intuu kala hadlayay xaqnimada iyo iscelinta iyo xukunka imanaya, ayaa Feelikos cabsaday oo u jawaabay oo ku yidhi, Haatan iska tag: oo markaan wakhti wanaagsan helo ayaan kuu yeedhan doonaa. ²⁶Wuxuu rajaynayay in Bawlos lacag siiyo isagii, sidaas daraaddeed ayuu marar badan u soo cid diray oo la hadlay isagii. ²⁷laakiin markii laba sannadood dhammaatay waxaa Feelikos jagadiisa qaatay Borkiyos Feestos: Feelikosna isagoo doonaya inuu Yuhuuddii ka farxiyo ayuu Bawlos daayay isagoo xidhan.

24:24 “Darusilla” Waxa ay ahayd tan ugu yadh, sida muuqatana aad u qurxoon, oo inantii uu Herados Agriiba II uu dhalay waxa ay ahayd Feelikos xaaskiisii saddexaad ee uu ka qaatay Asiisos, Boqorkii Emesa (cf. Josephus, *Antiq.* 20.7.2).



NASB, NRSV,
TEV, NJB “Ciise Masiix”
NKJV “Masiixa”

Fikirka #1 waxaa laga helayaa MSS P74, !*, B, E, iyo Laatiinkii Hore, qaybaha Vulgate. Aqriska yar waxaa laga helayaa MSS !c, A, C, iyo Peshitta iyo qaybaha Coptic. UBS4 waxa uu qaybta dheer siinayaa “B” isagoo ku qiimaynaya (ugu dhawaan mid sax ah). Mid ayaa la yaabaya in macnihiissa guud “Masiixa” ay ku jira loo tarjumi lahaa “Masaaya” (MS 044 waxa uu qorayaa “the Messiah”).

▣ **“rumaysad”** Kani waa erey fiqi ahaan muhiim a. Mawduuc Gaar ah ka eeg: 2:40; 3:16; iyo 6:5. Xusuusnow ereyadan fiqi ahaaneed eer ku jira Koine Greek aysan ku salaysnayn adeegsiga Giriigga, laakiin Septuagint-ga. Luukos aad ayuu u garanyaa Septuagint-ga. Wuxuu ahaa Axdigii Hore ee yaallay kaniisadda.

24:24-25 Bawlos wuxuu had iyo goor injiilka ku wacdiyay Feelikos iyo Darusilla sida ku jirta (cf. aayadda. 26b). Tani dhab ahaan waxaa weeye in Ciise ka doonayey inuu sidan sameeyo (cf. 9:15). Waa uu masiixiyobay, laakiin sidoo kale wuxuu ahaa mid hunguri weyun (i.e., wuxuu doonayey in uu Bawlos laaluush ka qaato) oo uu go'aankiisa dib u dhigo (cf. aayadda. 26).

24:26 Sida cad Bawlos wuxuu haystay xoogaa dhaqaale ah xilligii uu xabsiga ku jira. Waxaa macquul ah in (1) dhaxalkii uu shaqsi ahaanta u lahaa ama (2) caawimaad ka timid kaniisadaha (i.e., Philippi ama Thessalonica). Feelikos wuxuu Bawlos ugu yeeray ma ahayn inuu had iyo jeer maqlo hadalkiisa, laakiin rajooyin ku aaddan inuu laaluush ka helo.

24:27 “markii laba sannadood dhammaatay” Kuwo badan ayaa waxa ay rumaysan yihiin in ay waqtigan tahay markii Luukos uu marqaatiyadii warbixintoodii ka keenay kuwii Falastiin joogay sida ku diwaan gashan Injiilkiisa (cf. Luukos 1:1-4). Tani waxa ay ahayd mid aad waqti aad niyad jab ugu leh nin cadho badan sida Bawlos oo kale! Hase ahaatee, isagu xorriyadda laaluush kuma uusan raadin. Wuxuu rumayusnaa in uu Ilaah doonistiisa ku hoos jiray.

▣ **“Borkiyos Feestos”** Waxaa jira ismaandhaan ka dhex taagan taariikhyahannada Roomanka, Suetonius iyo Tacitus, oo ku aaddan bilaabiddii xafiiskiisa. Feelikos waxaa xukunka la siiyay A.D. 55, laakiin lama hubo in uu rumaysad lahaa oo laga qaaday dabadeedna dib loogu celiyay A.D. 59. Feestos wuxuu dhintay A.D. 62, isagoo weli xafiiska jooga (cf. Josephus, *Antiq.* 20.9.1). aariikhdiisa (cf. Josephus, *Antiq.* 20.8.9-10; *Wars* 2.14.1).

▣ **“Feelikos wuxuu xukunka ka tegay Bawlos oo xidhan”** Wax caado ah ayey ahayd in maxaabbiista la sii daayo marka maammulka la beddelo. Aayaddani waxa ay muujinaysaa xaaladda siyaasadeed ee Falastiin iyo tabardarrada hoggaamiyeyaasha Roomanka, si la mid ah awoodda golaha Sanhedrin.

SU'AALO FALQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraaga waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu yahay macnaha ereyga “Nazarene”?
2. Maxay ahaayeen tilaamaha magacii “jidka” ee kaniisadda sida ku jirta Falimha Rasuullada?
3. Sharrax muhiimadda ku jirta aayadda. 15.

FALIMAHA RASUULLADA 25

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos oo Agribba Hortiisa Isku Difaacaya 25:1-11	Bawlos Noloshiisii Hore 25:1-11	Bawlos oo Agribba Hortiisa Isku Difaacaya (25:13-26:32) 25:1	Bawlos oo Agribba Hortiisa Isku Difaacaya 25:1	Bawlos oo Agribba Hor Taagan 25:13-26:1 Bawlos Hadalkii Boqor Agribba Hortiisa
25:2-3	25:2-3	25:2-3 25:4-8 25:9-11	25:2-3 25:4-8 25:9-11	25:2-3 25:4-8 25:9-11
Bawlos oo Sheegaya Sidi uu Ku Masiixiyobay 25:12-18	Bawlos oo ka Sheekaynaya Masiixi Noqoshadiisii 25:12-18	25:12-18	Bawlos oo Sheegaya Sidi uu Ku Masiixiyobay 25:12-18	25:12-18
Bawlos u Marqaatkifuriddiisii Kuwa Yuhuudd ah iyo Kuwa Aan Yuhuudda ahayn 25:19-23	Bawlos Ka Sheekayntiisii Sidi uu Ku Masiixiyobay 25:19-23	25:19-23	Bawlo oo ka Sheekaynaya Shaqadiisa 25:19-23	25:19-23
Bawlos oo Agribba u Muujinaya in uu Rumaysto 25:24-29	25:24-32	25:24-29	25:24 25:25-27 25:28	Jawaabtii ay Kuwii Maqlayey ka Bixiyeen 25:24-29
25:30-32	25:30-32	25:30-32	25:29	25:30-32

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA EREYADA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 25:1-5

¹Haddaba Feestos markuu soo galay gobolkii. ayuu saddex maalmood dabadeed Kaysariya ka tegey. oo wuxuu aaday Yerusaaalem. ²Markaasaa wadaaddadii sare iyo raggii Yuhuudda u waaweynaa waxay isagii u sheegeen wax Bawlos ka gees ah, wayna baryeen ³oo axsaan ka weydiisteen inuu isaga Yerusaaalem u soo diro; iyagoo sirqool u dhigaya inay jidka ku dilaan. ⁴Habase yeeshee Feestos wuxuu ugu jawaabay in Bawlos lagu dhawrayo Kaysariya, iyo in isaga qudhiisuba dhaqsiyo halkaas u aadayo. ⁵Oo wuxuu ku yidhi. Haddaba kuwa idinku jira oo amarka lahu aniga ha ila tageen. oo haddii ninkaasu wax qallooc ah leeyahay. iyagu ha dacweeyeen isaga.

25:1 “Festus” Feelikos kani wuxuu ahaa nin guul badan. Si shaqsi ahaaneed ayuu billad u qaatay, laakiin sida cad isla cadaadiska siyaasadda iyo maskaxdu waa ay haysteen. Xafiis ayuu hayey labo sano deetana waxa uu dhintay A.D. 62 isagoo weli xafiiskii fadhiya (cf. Josephus, *Antiq.* 20.8.9).

▣ **“saddex maalmood dabadeed”** Tani waxa ay muujinaysaa sida uu hoggaanka Yuhuuddu u danaynayey Bawlos hawl waddiisa.

25:2 “wadaaddadii sare iyo raggii Yuhuudda u waaweynaa” Waxaa laga yaabaa in tani ay la xidhiidhay Sanhedrin, oo ka koobnaa 70 hoggaamiyeyaal Yuhuudda Yerusaaalem ah. Jewish leaders from Jerusalem. Waxay xeerka ugu sarreeya ee sharciga u dhiseen qaabkan xag siyaasad iyo xag diin labadaba. Mawduuc Gaar ah ka eeg: 4:5. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa sidoo kale laga yaabaa in ay la xidhiidho ama ay tilmaamayso dadka reer Yerusaaalem ee hantida iyo aqoonta leh kuwaasoo doonayey in ay la kulmaan midkan wax silcinaya si ay xidhiidh wanaagsan ula samaystaan isaga. Oo waxaa macquul ah in ay labada kooxda ka hadlayso. Labo sano kaddib waxaa jiray wadaad sare, oo la odhan jiray Ishmael ben Fabus (A.D. 56-62).

Isagu wuxuu sidoo kale doonayey inuu dhiso waddo fiican oo middan lagu sameeyaahi in ay tahay in la weeraro ninkan Bawlos la yidhaahdo ee diintoodii ka soo hor jeestay.

▣ **“waxay isagii u sheegeen”** Kani wuxuu ahaa fal amar ah oo soo noqnoqonaya. Marar badan ayey ku soo laalaabteen in ay weyddiidaan.

25:3 Tani waxa ay muujinaysaa cadawtinimada ay kooxdan wadaaddada hoggaamiyeyasha diimeed ahi kagala soo hor jeedaan Bawlos Waxay u arkeen Bawlos inuu yahay cadaw ku dhex jira!

▣ **“(isla markaa, iyagoo sirqool u dhigaya inay jidka ku dilaan)”** Xeeladdii hoggaankii Yuhuuddu isma uusan beddeli (cf. 23:12- 15).

25:5 “haddii” Tani waa jumlad xaalad heerka koowaad ah oo uu qoraagu ku muujinayo aragtidiisa ama ujeedkiisa (cf. A. T. Robertson, *Word Pictures in the New Testament*, vol. 3, bogga. 429). Dr. Bruce Tankersley, oo ah nin si gaar ah ugu takhasusay Koine Greek oo ka tirsan East Texas Baptist University, waxa uu sheegayaa in ay tahay heerka saddexaad maxaa yeelay kuma jiro ereyga fal-sameeye ah xaaladdan shuruudda ah dhexdeed.

NASB (UPDATED) TEXT: 25:6-12

⁶Oo markuu iyagii dhex joogay in aan ka badnayn siddeed ama toban maalmood. ayuu wuxuu aaday Kaysariya. kolkaasuu maalintii dambe fadhiistay kursigii xukumaadda; oo wuxuu amray in Bawlos la keeno. ⁷Oo kolkuu yimid, Yuhuuddii Yerusaaalem ka timid ayaa hareerihisii soo istaagtay, oo waxay keeneen dacwooyin badan oo waaweyn, oo ayan iyagu xaqiijin karin. ⁸Markii Bawlos isdaafacayay, ayuu wuxuu yidhi. Anigu innaba kuma dembaabin sharciga Yuhuudda ama macbudka iyo Kaysar toona. ⁹laakiin Feestos isagoo doonaya inuu Yuhuudda kaga farxiyo, ayuu wuxuu ku jawaabay oo Bawlos ku yidhi, Ma doonaysaa inaad Yerusaaalem tagto oo waxyaalahan halkaas hortayda lagugu xukumo? ¹⁰laakiin Bawlos wuxuu yidhi, Anigu waxaan hor taaganahay kursigii xukumaadda oo Kaysar: halkanay igu waajib tahay in lagu xukumo. Anigu Yuhuudda innaba xumaan kuma aan samayn. sidaad aad ugu og tahay. ¹¹Haddaba haddii aan xumaan falay oo aan galay wax dhimasho istaahila, geeri diidi maayo; laakiin waxyaalahan ay kuwanu igu dacwaynayaan haddii aan wax run ah lagu arag, ninna iima gacan gelin karo iyaga. Waxaan u ashtakoonayaa Kaysar. ¹²Markaasaa Feestos, markuu shirka la tashaday, ayuu wuxuu ku jawaabay, Kaysar baad u ashtakootay: Kaysar baad u tegaysaa.

Feestos wuxuu mooday in Bawlos uu dembiile yahay. Waxaa kaloo la is weyddiin karaa maxay tahay sababta ay hoggaamiyeyashii Yerusaaalem ugu adkaadeen dhibaatan?

25:6-9 Dhacdadani waxa ay Bawlos u muujisay in wax rajo xagga caddaaladda ah uusan Feestos. Wuxuu oгаа wixii Yerusaaalem uu ka soo raadiyey (cf. aayadda. 3). Wuxuu sidoo kale oгаа in Ciise uu ka doonayey inuu aado Rooma (cf. 9:15).

25:6 “markuu iyagii dhex joogay in aan ka badnayn siddeed ama toban maalmood” Waxaan tan ku qiyaasi lahaa in hoggaamiyeyashii Yuhuuddu ay cunto sharafeed u sameeyeen Feestos. Saraakiishii Roomanka oo dhan aye saamayn ku yeeshen.

25:8 Bawlos wuxuu caddaynayaa inuu dhibbane u yahay dhamman eedaynaha ka soo hor jeeda

1. sharcigii Muuse (cf. 21:21,28)
2. macbudka (cf. 21:28; 24:6)
3. Kaysar (cf. 16:21; 17:7)

Tan koowaad iyo tan labaad ayaa ah ayaa ah wixii dhab ahaan lagu soo eedeeyay ee ku jirta 6:13-14.

25:10-11 Bawlos wuxuu caddaynayaa inuu horay u taagnaa amarka iyo booska gaarka ah. Luukos wuxuu tan ku diwaan gelinayaaaayadda. 11 sida Bawlos uu Kaysar racfaanka uga qaatay. Ka racfaan-qaadashada Kaysar waxa ay markii hore ka bilowday xilligii 30 B.C. (cf. Dio Cassius, *History*, 51.19). Waxaa la ballaadihiyey in la mabnuuco indho-karididda, habaarka, jidh-dilka qof kasta oo Rooman u dhashay oo racfaan ka qaata Kaysar (cf. Paulus, *Sententiae* 5.26.1).

Waxaa jira waxaa qarnigii koowaad jiray wada-hadal ku saabsanaa Sharciga Rooma sida ku qoran A. N. Sherwin-White’s *Roman Society and Roman Law in the New Testament*, “lecture four: Paul before Felix and Festus,” bogagga. 48-70.

25:11 “haddii. . .haddii” Kuwani waa jumlad xaalad heerka koowaad ah oo loo malaynayo in ay tahay ujeed uu qoraagu ku muujinayo wixii uu uga soo bixi lahaa. Sida macnaha guud ku jirta labadan adeegsi waxa ay muujinayaan sida isku-xidhka naxwe ahaaneed loogu sameeyay in wax lagu tilmaamo. Marka koowaad waa been kazoo tag oo runta u imow (laakiin sida dhabta ahi waa isla xaaladda uu Feelikos adeegsaday ee ku jirta aayadda. 5); tan xigtana waa run xaqiiq ku socota.

▣ **“geeri diidi maayo”** Bawlos wuxuu aqoonsaday awoodda dalka (cf. Rom. 13:4). Marka laga eego aragtida Axdigii Hore ee ku aaddan ciqaabta dilka waxaa laga heli karaa Bilowgii. 9:6. Arrin xiiso leh oo ku saabsan ciqaabta dilka ah ka eeg *Hard Sayings of the Bible*, pp. 114-116.

▣

NASB, TEV “ninna iima gacan gelin karo iyaga”

NKJV “ninna iima gacan gelin karo iyaga”

NRSV “ninna xaggooda iima leexin karo”

NJB “ninna xuquuq uma laha inuu ii dhiibo iyaga”

Ereyga *charizomai* asaas ahaan macnihiisu waa “in la weyneeyo” ama “naxariis u muujin.” Bawlos waxa uu xaqiiqsaday in Feestos uu isku dayayey inuu hoggaamiyeyaasha Yuhuudda fahansiiyo isagoo isaga siinaya! Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa macquul ah in Feestos uu isku dayayo in uu taageero amarka guud ee ka yimid Juliyas Kaysar (cf. Josephus, *Antiq.* 14.10.2), kaasoo saraakiishii Roomanka ee Falastiin si ay u oggolaadaan doonista wadaadka sare.

▣ **“Waxaan u ashtakoonayaa Kaysar”** Tani waa xuquuq sharci u ah qofka kasta oo Rooman dhalashadii leh oo ku jira xaaladaha ciqaabta dilka (Pliny the Younger, Letters 10.96). Markan sida taariikhda ku jirta, Nero waxa uu ahaa Kaysar (A.D. 54-68).

25:12 “markuu shirka la tashaday” Tani waxa ay tilmaamaysaa qabiirradii Roomanka ahaa ee Feestos, ee ma aha hoggaamiyeyaashii Yuhuudda.

FAHANKA MACNAHA GUUD EE FALIMAHA RASUULLADA 25:13-26:32

TAARIIKHDA

A. Herados Agribba II (Marcus Juliyas Agribba)

1. Isagu waa wiilkii Herados Agribba I (cf. Acts 12), kaasoo ahaa hoggaamiyaha siyaasadeed ee Yahuudiya si uu maamulo Macbudka iyo Wadaadnimada (A.D. 41-44) iyo wiilka ugu weyn ee Herados-ka weyn.
2. Wuxuu wax ku bartay Rooma oo Roomanka ayuu taabacsanaa. Wuxuu Rooma ku laabtay dagaalkii Yuhuudda ee A.D. 70 wuxuuna halkaa ku dhintay A.D. 100.
3. Isagoo 17sano jidh ah ayuu aabbihii dhintay, oo aad ayuu uga yaraa inuu boqornimadiisa qabsado.
4. Sanaddii A.D. 50 Herados Chalcis, Agribba II adeerkii, Boqorkii Chalcis (oo ahayd boqortooyo yar oo Waqooyiga Falastiin ka jirta), ayaa dhintay Agribba II oo waxaa boqortooyadiisii la siiyey Boqor Kalawdhiyas. Waxaa sidoo kale lagu wareejiyay maammulkii Macbudka iyo Booskii Wadaadka Sare.
5. Sanaddii A.D. 53 wuxuu boqortooyadiisii yarayd ku wareejiyey Herados Filibos oo qayn waddanka u talin jiray (Ituraea iyo Trachonitis) iyo Lsanius (Abilene).
6. Goor dambe, Boqor Nero ayaa ku daray magaalooyin gaar ah iyo xaafado ku teedsanaa Badda Galiili oo uu maammuli maammuli jiray. Caasimadiisu waxa ay ahayd Kaysariya Filibbi oo uu goortii dambe magaceeda u bixiyey Neroniyas.
7. Txraaca xagga taariikhda cf:
 - a. Josephus *Jewish Wars* 2.12.1,7-8; 15.1; 16.4; 7.5.1
 - b. Josephus’ *Antiquities of the Jews* 19.9.2; 20.5.2; 6.5; 7.1; 8.4; 9.6.

B. Bernikee

1. Waxa ay ahayd Herados Agribba I. gabadhiisa uu dhalay ee ugu weyn
2. Waxa ay ahayd Agribba II walaashii, oo mar ayaa waxaa laga yaabaa in ay dhacday in ay jacayl ku dhow ahayd tan wax caddayn ah looma hayo, waa nuxnux oo qudha). Goor dambe ayey waxa ay amiirad u ahayd Boqor Tiitos markii uu janaraalka ahaa. Ninkani wuxuu ahaa janaraalkii burburiyey Yerusaaalem iyo Macbudka sanaddii A.D. 70.
3. Waxay ahayd Darusilla walaasheed (cf. 24:24).
4. waxaa guursaday Herados Chalcis (Herados Agribba I walaakiis, oo adeerkeed ahaa), laakiin markii uu dhintay kaddin waxay la soo guurtay walaakeed.

5. Waxay goor dambe guursatay Polemon, loo Cilicia boqor ka ahaa, laakiin way ka tagtahy oo u laabatay walaakeed oo markaas la siiyey magac “Boqorka.”
6. Waxay ahayd amiiraddii Boqortooyadii Vespasian.
7. Tixraac taariikh ahaaneed
 - a. Josephus *Jewish Wars* 2.1.6; 15.1; 17.1.
 - b. Josephus’ *Antiquities of the Jew* 19.9.1; 15.1; 20.1.3
 - c. Tacitus’ *History* 2.2
 - d. Seutonius’ *Life of Titus* 7
 - e. Dio Cassius’ *Histories* 65.15; 66.18
 - f. Juvenal’s *Satire* 61.156-157

NASB (UPDATED) TEXT: 25:13-22

¹³Haddaba kolkii dhawr maalmood la soo dhaafay ayaa waxaa Kaysariya y imid oo Feestos soo salaamay boqor Agribba iyo Bernikee. ¹⁴Oo kolkii ay maalmood badan halkaas jooheen ayaa Feestos wuxuu boqorkii hor dhigay dacwadii Bawlos, oo wuxuu ku yidhi. Waxaa jira nin Feelikos ka tegey isagoo maxbuus ah; ¹⁵kaasoo waagii aan Yerusaleem joogay ay wadaaddadii sare iyo waayeelladii Yuhuuddu igu soo dacweeyeen iyagoo doonava in la xukumo isagii. ¹⁶Iyagii waxaan ugu jawaabay oo ku idhi. Ma aha caadada reer Rooma in ninna xukumaad loo dhiibo intaan mudduciyaasha layska hor keenin muddacalayga oo la siin fursad uu isaga daafaco xaalka lagu ashtakeeyey. ¹⁷Haddaba markii ay halkan wada yimaadeen. anigu innaba siima aan raagin ee maalintii dambe ayaan waxaan ku fadhiistay kursigii xuku- maadda, oo waxaan amray in ninka la keeno. ¹⁸laakiin markii ay mudduciyaashii istaageen, ma ay keenin innaba wax xumaan ah oo u eg wixii aan filanayay; ¹⁹laakiin waxay lahaayeen su'aalo isaga ka gees ah oo ku saabsan diintooda iyo mid Ciise la odhan jiray oo dhintay, laakiin Bawlos leeyahay inuu nool yahay. ²⁰Haddaba anigoo ka shakiyaya sidii aan waxyaalahan u sii haybin lahaa, ayaan waxaan isagii weydiistay bal inuu Yerusaleem tegayo oo meeshaas lagu xukumo waxyaalahan iyo in kale. ²¹laakiin markii Bawlos doonayay in la sii hayo ilaa boqorku gar gooyo, waxaan amray in la sii hayo ilaa aan isaga Kaysar u diro. ²²Markaasaa Agribba wuxuu Feestos ku yidhi, Aniguba waxaan jeclaan lahaa inaan ninka maqlo. Markaasuu yidhi, Berritaad maqlaysaa.

25:13 “Boqor Agribba” Tani waxa ay tilmaamaysaa Agribba II. Wuxuu ahaa Drusilla and Bernikee walaalkood. Wuxuu wax ku soo bartay Rooma waxa uuna daacad u ahaa siyaasadaha iyo barnaamijyada Rooma.

MAWDUUC GAAR AH: BARNIKEE

1. Waxay ahayd canugta ugu weyn Herados Agribba I.
2. Waxay ahayd Agribba II walaashiis, oo ay dhici kartay in ay mar jacylkiisa ahayd. Goor dambe waxay amiirad u ahayd Tiitos markii uu janaraalka ahaa.
3. Waxay sidoo kale ahayd Darusilla walaasheed, oo ahayd xaaska saddexaad ee Feelikos.
4. Waxaa iyada guursaday (Herados Agribba I walaakiis, oo adeerkeed ahaa), laakiin markii uu dhintay waxay la soo guurtay walaakeed.
5. Waxay goor dambe guursatay Polemon, loo Cilicia boqor ka ahaa, laakiin way ka tagtahy oo u laabatay walaakeed oo markaas la siiyey magac “Boqorka.”
6. Waxay ahayd amiiraddii Boqortooyadii Vespasian iyo Tiitos labadaba.
7. Tixraac taariikh ahaaneed
 - a. Josephus’ *Jewish Wars* 2:11:6; 15:1; 17:1.
 - b. Josephus’ *Antiquities of the Jew* 19:9:1; 15:1; 20:1:3
 - c. Tactius’ *History* 2:2
 - d. Seutonius’ *Life of Titus* 7
 - e. Dio Cassius’ *Histories* 65:15; 66:18
 - f. Juvenal’s *Satire* 61:156-157

25:13-19 Tani waxa ay mar kale muujinaysaa ujeeddooyinkii macne iyo fiqi ahaaneed ee Luukos, oo ahayd inuu muujiyo in Masiixiyaddu aysan hanjabaad siyaasadeed ku ahayn Roomanka (cf. aayadda. 25). Tobannadii sano ee qarnigii koowaad ugu horreeyay ee Masiixiyadda waxaa la ansixiyey qayb sharciga Yuhuudda ah, waxayna Roomanku u ictiraafeen in ay diin bannaan taha. Rooma maysan doonayn in qaybaha diimaha Yuhuudda ay muranno ka dhex dhashaan!

25:18 “markii ay mudduciyaashii istaageen, ma ay keenin innaba wax xumaan ah oo u eg wixii aan filanayay” Tani waxa ay muujinaysaa xamaasadda iyo dabecadda liddi-noqoshada Yuhuudda. Maysan ahayn xagga siyaasadda, laakiin xag diimeed.



NASB, NRSV,	
NJB, NIV	“dembiyo”
NKJV	“waxan oo kale”
TEV	“dembiyo shar ah”
REB	“eedayn”
NET Bible	“camallo shar ah”
ASV	“waxyaabo shar ah”

Waxaa jira dhowr kala duwanaansho.

1. *ponērōn* – JAMAC LAHAANSHO AH in MSS \aleph^2 , B, E, oo ah “waxyaabo shar ah” (cf. 28:21)
2. *ponērau* – FAL LAGU-SAMEEYE AAN JAMAC AHAYN in MSS P74, A, C*
3. *ponēra* – FAL LAGU-SAMEEYE JAMAC AH in MSS \aleph^* , C2
4. omit – MSS L, P, iyo qaar kitaabbada wax laga wacdiyo ah (cf. NKJV) UBS4 waxa ay siinayaa #1 qoraalka dhexdiisa “C” iyagoo ku qimaynaya (way adag tahay in go’aan laga gaaro). Feelikos waxaa ka yaabiyey in eedaynadu aysan qatar ahayn oo xagga diinta Yuhuuddana wax laga odhan karay, oo aysan ahayn wax sharci a.

25:19 “diin” Tani lafdi ahaan waa labo erey oo isku xidhan “cabsi” iyo “ilaahyo.” Waxa uu ereygu noqonayaa “superstition,” oo ah waxa ay hoggaamiyeyaashan roomanka ah ay u malaynayaan diinta Yuhuudda. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Feestos muusan doonayn inuu caayo dadkiisa diinta ee qiimaha sare leh, sidaas daraaddeed wuxuu adeegsaday erey dhowr macne yeelan kara (Bawlosna, sidoo kale, 17:22). Aayadaha 18-19 waxa ay mar kale muujinayaan in sharciga roomanku uusan wax qalad ah ku helin Bawlos iyo masiixiyadda.

▣ “ku saabsan diintooda iyo mid Ciise la odhan jiray oo dhintay” Sarekiciddu waxa ay ahayd mid ka mid ah udub-dhexaaddada kulannadii wacsiyada (*kerygma*, ka eeh Mawduuca Gaarka ah 2:14) sida ku jirta Falimaha Rasuullada (cf. 26:8). Masiixiyaddu way ku istaagaysaa ama ay ku dhacaysaa tusaalahan fiqi ahaaneed (cf. I Korintos 15).

NASB (UPDATED) TEXT: 25:23-27
²³Sidaas daraaddeed maalintii dambe ayaa Agribba iyo Bernikee waxay la yimaadeen bandhig weyn. oo waxay soo galeen maxkamaddii, iyaga iyo nimankii sare iyo raggii magaalada ugu waaweynaa. Markaasaa Feestos wuxuu amray in Bawlos loo keeno. ²⁴Markaasaa Feestos wuxuu yidhi. Boqor Agribba iyo ragga kale oo halkan nala jooga oo dhammow, waxaad arkaysaan ninkan Yuhuudda badan oo dhammu ay iiga soo cabteen Yerusaaalem iyo halkanba, iyagoo ku qaylinaya, Waajib ma aha in ninkanu sii noolaado. ²⁵laakiin waxaan ogaaday inuusan samayn innaba wax dhimasho istaahila: oo isaga qudhiisuba wuxuu u ashtakooday boqorka. sidaas daraaddeed waxaan goostay inaan isaga diro. ²⁶Haddaba anigu ma hayo wax xaqiiqa ah oo ninkan ku saabsan oo aan sayidkayga u qoro. Sidaas daraaddeed ayaan isaga hortiiinna u keenay. iyo khusuusan adiga hortaa. boqor Agribbow, in kolkii loo imtixaamo dabadeed aan helo wax aan qoro. ²⁷Waayo, waxay ila eg tahay caqliyaraan in maxbuus la diro iyadoo aan aad loo xaqiijin wixii lagu ashtakeeyey.

25:23 Maxay fursad cajiib ah tahay in injiilka wax lagu wacdiyo!

▣ **“nimankii sare”** Kani waa ereyga *chiliarch*, oo macnihiisu yahay hoggaamiyeyaasha kun u taliya, sida hoggaamiyeyaasha boqol u taliya. Waxaan Josephus’ *Antiq.* 19.19.2, ka baran karnaa in shan taliye military ay jireen.

▣ **“raggii magaalada ugu waaweynaa”** Tani waxa ay tilmaamaysaa hoggaamiyeyaasha shacabka ee Kaysariya.

Xusuusnow kooxaha wada jidhka ah.

1. silciye Rooman ah
2. Idumean oo boqor gobol ahaa
3. hoggaamiyeyaal millatari oo Rooman ah
4. odayadii ugu sarreeyay kaysariya

25:26 “Boqorkii” Ereygan waa *sebastos*, oo erey Giriig oo la macna ah ereyga Laatiinka ah ee *augustus*. Macnihiisu waxa uu noqonayaa “xushmayn, “jacayl qoto dheer,” “darajayn,” ama “caabudid.” Waxaa markii koowaad ay golaha sare ku adeegsadeen Buuggooda gaarka ah sannadkii 27 B.C. Halkan, waxaa loogu adeegsaday Nero (A.D. 54-68). Waxay u eg tahay in Nero uu balldhiyay caabudidida diintii Boqortooyada.

25:26 “anigu ma hayo wax xaqiiqa ah oo ninkan ku saabsan oo aan sayidkayga u qoro” Feestos waxaa haysay dhibaato la mid ah tii Lysias, taliyihii Yreusaalem ka. Waxa uu ku gawracnaa inuu fuliyo sharciga Roomanka si uu u qoro wax Bawlos ka dhan ah si kasta ha ku keene xitaa inuu xeerka Yuhuudda adeegsado oo uu caddayn ka dhigto. Bawlos wax mucjiso ah ayuu ku noqday hoggaamiyeyaashii Roomanka.

▣ **“sayid”** Kani waa ereyga *kurios* oo ah Giriig, oo macnihiisu yahay milkiile, taliye, hoggaamiye. Tani waa markii ugu horraaysay ee magic ahaan loogu yeedho isagoo keligiis ah. boqortooyinkii Octavian/Augustus iyo Tiberias waa ay diideen magacan maxaa yeelay waxa dareemeen in uu ku dhow yahay ereyga Laatiinka ah *rex* (boqor), kaasoo raaxo-darro ku abuuray dadkii degaan iyo duqaydii sare. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxa ay u muuqanaysaa in ay soo if baxday waqtigii Nero kaddib.. Vespasian iyo Titus waxay adeegsadeen ereyga “badbaadiye” Domitian-na waxa juu adeegsaday “ilaah” si ay naftooda u qeexaan (cf. James S. Jeffers, *The Greco-Roman World* p. 101). Ereyga *kurios* wuxuu noqday mid yool ama bartilaameed u noqday in lagu silciyo Masiixiyiinta, kuwaasoo Ciise Masiix oo qura u adeegsanayey ereygan. Waa ay diideen in ay u adeegsadaan wax qurbaan ahaan loo gubo ama ay Roomanka ku murweynayaan.

SU’AALO FALQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sababtee bay hoggaamiyeyaasha Yuhuuddu uga baqeen una diideen Bawlos?
2. Sidee buu cutubkani u soo saarayaa ujeedkuu Luukos u qoray Falimaha Rasuullada?
3. Maxay ahayd sababtii uu Bawlos isugu hor difaacay Agribba and Barkinee?

FALIMAHA RASUULLADA 26

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos oo isku hor difaacay Agribba	Noloshii Bawlos ee hore	Is difaacistii Bawlos ee Agribba hortiisa (25:13-26:32)	Bawlos oo isku hordifaacay Agribba	Bawlos oo hor istaagay boqor Agribba 25:13-26:1
26:1-11	26:1-11	26:1	26:1	Hadalkii Bawlos ee boqor Agribba hortiisa
		26:2-3	26:2-3	26:2-3
		26:4-8	26:4-8	26:4-8
		26:9-11	26:9-11	26:9-11
Bawlos oo sheegay rumaysi yeelashadiisii	Bawlos oo dib u sheegay siduu rumaysadka ku yeeshay		Bawlos oo sheegay rumaysi yeelashadiisii	
26:12-18	26:12-18	26:12-18	26:12-18	26:12-18
Bawlos oo u markhaati furay Yuhuudda iyo kuwaan ahaynba	Rumaysad yeelashadii Bawlos ee hore		Bawlos oo sheegay shaqadiisa	
26:19-23	26:19-23	26:19-23	26:19-23	26:19-23
Bawlos oo Agribba u sheegay inuu rumaysto				Ka jawaab celintii dhegastayaashiisa
26:24-29	26:24-32	26:24-29	26:24	26:24-29
			26:25-27	
			26:28	
			26:29	
26:30-32		26:30-32	26:30-32	26:30-32

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA EREYADA AAYDAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 26:1

¹Markaasaa Agribba wuxuu Bawlos ku yidhi, Waa lagu fasaxay inaad nafsaddaada u hadashid. Kolkaasaa Bawlos gacantiisa fidiyey oo isdaafacay.

26:1 “gacantiisa fidiyey” Waxa ay ahayd salaan iyo hordhac samayn (cf. Fal 12:17; 13:16 iyo 21:40, iyadoo loo adeegsaday soo jeedinta dadka iyo aamusiinta).

NASB (UPDATED) TEXT: 2-3

²Boqor Agribbow, waxaan isku tirinayaa mid faraxsan inaan maanta hortaada isaga daafaco waxyaalihii ay Yuhuuddu igu soo dacweeyeen oo dhan; ³maxaa yeelay, adigu waxaad khusuusan xariif ku tahay caadooyinka iyo su'aalaha oo dhan oo Yuhuudda dhex yaalla; haddaba waxaan kaa baryayaa inaad ii dulqaadatid oo aad i maqashid.

26:2-3 Bawlos waxa uu isu difaacayaa si ay ku jirto faanin, sidii uu isugu hor difaacay Feelikos oo kale (cf. 24:10), kaasi oo ahaa dhaqan ahaan mid lagama maarmaanimadiisa la filayay.

26:2 “inaan maanta hortaada isaga daafaco waxyaalihii ay Yuhuuddu igu soo dacweeyeen oo dhan” Agribba II waxa lasoo hordhigay xuna xukun ku saabsan Macbadka iyo wadaad ka socda Rooma. Inkasta oo uu ahaa Roomaan hadana waxa uu wax ku bartay Rooma waxaanu fahansanaa wax ku saabsan iimaanka Yuhuudda (cf. aayadda. 3).

▣ “mid faraxsan” Waxa ay la mid tahay ereyga lagu sheegay waxyaalaha wanaagsan ee Matayos. 5:3-12; Luukos 6:20-22; iyo Sabuurka. 1:1 ku sugan Sabtuujantiga.

26:3

NASB, NKJV

“caadooyinka iyo su'aalaha”

NRSV

“caadooyinka iyo waxyaalaha la isku khilaafsanyahay”

TEV

“dhammaanba caadooyinka Yuhuudda iyo muranada”

NJB

“caadooyinka iyo muranka”

Ereyga hore waa *ethōn*, oo ah ka uu ka yimid ereyga Ingiriisida ah ee “ethnic,” ama dhinaca dhaqan ee koox dad ah. Ereyga labaad ee *dzētēmaton* marar badan ayaa lagu dhex isticmaalay Falimaha Rasuullada isaga oo tusinaya maranada dhex yaalla rabbaaniyiinta Yuhuudda ah (cf. 15:2; 18:15; 23:19; 25:19; 26:3). Kuwani may

ahayn arrimo aan caadi ahayn sababtuna waa iyadoo ay jireen qaybo badan oo ah Yuhuuddii qarnigii koobaad sida: Sadukiin, Farrisiin (sidoo kale qaybaha fiqi ahaaneed ee Shammai iyo Hillel), iyo qiiroolayaasha.

NASB (UPDATED) TEXT: 26:4-8

⁴Yuhuuddu dhammaantoodba tan iyo yaraantaydii way wada yaqaanin camalka noloshayda, taasoo bilowga aan kula dhex jiray quruuntayda oo aan Yerusaaalem la joogay. ⁵Haddii ay raalli ku yihiin inay ii marag furaan, iyaguba tan iyo horraantii aqoon bay u lahaayeen sidii aan ugu dhaqmi jiray dariiqada diintayada ugu qiiro adag anoo Farrisi ah. ⁶Haddaba waxaan haatan halkan u taaganahay in la ii xukumo rajadii ballankii Ilaah u qaaday awowayaashayo. ⁷Oo laba iyo tobankayaga qabiilba waxay Ilaah aad ugu adeegaan habeen iyo maalinba iyagoo rajaynaya in ay ballankaas helaan. Haddaba boqorow. Yuhuuddu waxay igu ashtakeeyeen wax rajadaas ku saabsan! ⁸Haddii Ilaah kuwii dhintay soo sara kiciyey, bal maxaad ugu qaadateen wax aan la rumaysan karin?

26:4 “Yuhuuddu dhammaantoodba tan iyo yaraantaydii way wada yaqaanin camalka noloshayda” Bawlos middan marar dhowr ah ayuu kusoo celceliyay (cf. Fal 22:3-5; 23:1; 24:16; 25:8). Bawlos waxa uu Yuhuudda ku dhex noolaa nolol lagu daydo Yerusaaalem dhexdeeda (cf. aayadda. 5).

▣ **“quruuntayda”** Lama hubo meesha uu Bawlos ku koray. Waxa middani ay sheegi kartaa (1) Tarsos tii Silisiya ama (2) Yerusaaalem.

26:5 “haddii” Waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah oo loogala jeedo waxqabad. Halkan Bawlos waxa uu ku garanayaa in ay ka markhaati furi karaan wakhtigiisii hore balse aanay rabin inay sameeyaan.

▣ **“dariiqada diintayada ugu qiiro adag anoo Farrisi ah”** Waxay ahaayeen qayb ama mad-hab ka mida diinta Yuhuudda oo soo baxay wakhtigii Makabiyaanka. Waxay ku dhaqmi jireen sharciga qoran iyo ka afka laga sheego labadaba. Eeg Mawduuca Gaarka ah 5:43.

26:6 “rajadii ballankii Ilaah u qaaday awowayaashayo” Tani waxa ay sheegaysaa waxsii sheegidda Axdiga Hore ee (1) Masiixa iman doona (2) sarakicidda kuwa dhintay (cf. 23:6; 24:15; Ayuub 14:14-15; 19:25-27; Daanyeel. 12:2). Bawlos waxa uu arkay “Jidka” oo ah dhammaystirka Axdiga Hore (cf. Matayos. 5:17-19; Galatiya 3).

Wax ku saabsan “rajo” ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 2:25 iyo Mawduuca Gaarka ah 2:14.

26:7 “Oo laba iyo tobankayaga qabiilba” Abtirsiiinta qabiilku (carruurta Yacquub) waxa uu ahaa mid muhiimad ku dhex leh Yuhuudda dhexdooda. Kuwo badan oo ka mid ahaa tobanka qabiil ee woqooyigu weligood kamay soo laabanin musaafurintii Ashuuriyaanka (722 C.H.). Waxa aan xoogaa warbixina oo qabiilka ku saabsan ka heli karnaa Axdiga Cusub.

1. Maryan, Yuusuf, iyo Ciise waxay ahaayeen qabiilka Yahuudah (cf. Matayos. 1:2-16; Luukos 3:23-33; Muujintii. 5:5)

2. Anna qabiilkiisa waxa lagu sheegay Aseer (cf. Luukos 2:36)

3. Bawlos qabiilkiisa waxa lagu sheegay Benyaamiin (cf. Rooma. 11:1; Filiboy. 3:5)

Herodos waxa uu ka hinaasaysnaa arrintan waxaanu hayay waxyaalaha dhex yaalla Macbadka oo ah abtirsiiyino la gubay. Wax ku saabsan “labo iyo toban” ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 1:22.

▣ **“rajadaas”** Waxa lala yaabi karaa rajada uu ka hadlayo Bawlos. Si guud ahaaneed marka loo eego waxa ay noqon kartaa sarakicista (aayadda 8). Eeg Mawduuca Gaarka ah: Rajo 2:25.

▣ **“Ilaah aad ugu adeegaan habeen iyo maalinba”** Bawlos waxa uu jeclaa dadkiisa (cf. Rooma. 9:1-3). Waxa uu garanayay sida ay aadka isugu dayaan inay ugu adeegaan YHWH. Sidoo kalena waxa uu si gaara u ogsoonaan khatarta ku sugna sharciga iyo waxyaalaha la xidhiidha.

“habeen iyo maalinba” waxa loo adeegsan jiray joogtaynta wax (cf. 20:31; Luukos 2:37).

26:8 “bal maxaad ugu qaadateen wax aan la rumaysan karin” Bawlos waxa uu la hadlayaa labo kooxood:

1. Agribba iyo Yuhuuddii kale ee joogtay
2. kuwii Yuhuudda aan ahayn ee joogay, sida Feestos

▣ **“haddii”** Waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah oo xagga qoraaga dhiniciisa marka laga eego u muuqata run.

▣ **“Ilaah kuwii dhintay soo sara kiciyey”** Weedhani waxay ka hadlaysaa rajada Yuhuudda ee guud ahaan ah sarakicista (eeg Ayuub14:14-15; 19:25-27; Ishacyaah. 25:8; 26:19; Daanyeel. 12:2-3), laakiin Bawlos waxa uu si gaara maanka ugu yahay sarakicidda Ciise (cf. I Korintos. 15:1-28). Eedeeyayaashii Sadukiintuna halkan aad ayay uga xanaaqayeen (cf. 23:1-10).

NASB (UPDATED) TEXT: 26:9-11

⁹Runtii aniga qudhayduba waxaan mooday inay waajib igu tahay inaan sameeyo waxyaalo badan oo wada khilaafsan magaca Ciisaha reer Naasaret. ¹⁰Oo sidaasaan ku sameeyey Yerusaaalem; weliba waxaan xabsi ku xidhay kuwo badan oo qoduusiin ah. anigoo amar ka wata wadaaddada sare, oo kolkii la dilayayba waan ku raacsanaa. ¹¹Oo marar badan ayaan iyaga ku ciqaabay sunagogyada oo dhan. oo waxaan qasbay inay caytamaan; oo intaan aad iyo aad ugu cadhooday. ayaan iyaga ku silciyey tan iyo xataa magaaloovin ajanabi.

26:9 Bawlos (*egō*, “aniga” iyo *emautō*, “laftayda”) waxa uu qiranayaa sidii uu u qaldanaa, isaga oo garanaya in aanay ahayn doonista Ilaah (cf. I Timoteyos. 1:13). Waxa uu u malaynayay silcinta kuwa raaca Ciise in uu Ilaah ugu adeegayo isla markaana uu ku raalli gelinayo. Bawlosna waxa uu si buuxda isu bedelay markii uu kusii socday Dimishiq (cf. Fal 9).

▣ **“magaca”** Ereygan Sematiga ah waxa loogala jeeda “shakhsiga” (cf. 3:6,16). Tani maaha qaacido sixir ah, laakiinse waa xidhiidh shakhsi ahaaneed!

▣ **“Ciisaha reer Naasaret”** ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 2:22.

26:10 “qoduusiin” Macnaha caadiga ah waxa loogala jeedaa “kuwo quduus ah.” Bawlos hadda waxa uu si saxa u garanayaa ciddii uu silciyay ee uu dilay oo ah dadka Ilaah! maxaa ka naxdin badan oo ka murugo badan waxyaalaha Bawlos loo iftiimayay markii uu ku socday Dimishiq, taasi oo hadda ku keentay is bedel gebi ahaan ah.

Waxa ku saabsan “quduusiin” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 9:13.

▣ **“anigoo amar ka wata”** Bawlos waxa uu ahaa siliciyaha “gaarka ah” ee Sanhadriinka.

▣ **“oo kolkii la dilayayba”** Waxa ay tusinaysaa xoogga ay lahayd silcintu. “Jidku” muu ahayn wax yar; waxa ay ahayd arrin wadata nolol iyo dhimasho, ilaa haddana waa sidaas!

▣ **“waan ku raacsanaa”** Waxa weeyi ereyga xagga Giriigga loogu isticmaalo codaynta ama taageeridda Sanhadriinka ama sunagogga. Laakiin maadaama oonu jirin sunagog hoose oo isku raaci kara arrimaha dhimashada, waxa samaynayay Sanhadriinka. Haddii ay ahaayeen Sanhadriinka, waxay ahayd markaas in Bawlos la dilo. Ereygan asal ahaan waxa loogala jeedaa “dhagxin” kaasi oo lagu codayn jiray (Muujintii 2:17).

26:11 “**ku ciqaabay**” Waa falka aan dhammaystirnayn ee erayga Giriigga ah ku samaynasa macnaha khasbitaanka (cf. 28:19), laakiinse halkan waxay ku tusinaysaa macnaha ku dayista ah. waxa ay tusinaysaa fal lagusoo celceliyay wakhti tegay.

▣ “**inay caytamaan**” Sawlos wax uu isku dayay inuu iyagu ku qasbo in ay qirtayn iimaanka ay ku leeyihiin Ciise oo ah Masiixa kaddibna uu xukumo. Silcimihihi danbe, rumaystayaasha waxa lagu qasbay inay diidaan rumayska ay ku leeyihiin Ciise, laakiinse tani waa arrin dhaqan ahaaneed oo gaar ah.

▣

NASB “oo intaan aad iyo aad ugu cadhooday.”
NKJV “aad uga cadhooday”
NRSV “waxaan ahaa mid aad uuga xanaaqa”
TEV “waan ka xanaaqsanaa”
NJB “cadhada aan iyaga u qabay waxay ahayd mid wayn”

Waxa weeuo falkaabe (“aad iyo aad”) iyo fal mafcuulku soo horreeyo. Feestos ayaa sidan oo kale u adeegsanaya Bawlos (i.e., badnayd da ku sugan 26:24).

NASB (UPDATED) TEXT: 26:12-18

¹²Oo markaan Dimishaq u sodcaalayay boqorow. anigoo wata amarkii iyo dardaarankii wadaaddada sare, ¹³ayaan waxaan hadhkii arkay, intaan jidka marayay, iftiin samada ka baxaya oo qorraxda ka sii dhalaal dheer, oo ka iftiimaya hareerahayga aniga iyo kuwii ila socdayba. ¹⁴Oo kolkii aannu dhammaantayo dhulka ku wada dhacnay, ayaan maqlay cod afka Cibraaniga ku hadlaya oo igu leh. Sawlosow. Sawlosow. maxaad ii silcinaysaa? Way kugu adag tahay inaad harraatidid wax ku muda. ¹⁵Markaasaan idhi. Yaad tahay Sayidow? Kolkaasaa Rabbigu wuxuu igu yidhi, Waxaan ahay Ciisaha aad silcinaysid. ¹⁶laakiin bal sara joogso, oo cagahaaga ku istaag: waayo. sababtan aawadeed ayaan kuugu muuqday inaan kaagaga dhigo midiidin iyo markhaati waxyaalihii aad igu aragtay iyo waxyaalaha aan kuugu muuqan doonaba; ¹⁷anigoo kaa samato bixinaya dadka iyo quruumaha aan kuu diri doonaba, ¹⁸inaad indhahooda furtid si ay gudcur uga soo jeestaan oo ay iftiinka ugu soo jeestaan. iyo inay ka soo leexdaan xoogga Shayddaanka oo ay Ilaah u yimaadaan. inay helaan dembidhaaf oo ay dhaxal la helaan kuwa qodus lagaga dhigay rumaysadka ay igu leeyihiin.

26:12 Luukos waxa uu diiwaan gelinayaa markhaati furka shakhsi ahaaneed ee Bawlos saddex jeer sida ku sugan Fal, 9:1-31; 22:3-21, iyo halkan. Naxariista Ilaah doorashada Sawlos waxay ahayd mid cad. Haddii Ilaaha ku dhex jira Masiixu uu cafiyi karo isla markaana adeegsan karo ninkan, waxa uu cafin karaa oo isticmaali karaa qofkasta!

26:13 ka eeg sharraxa buuxa ee 9:3.

Xaqiiqadu waxa weeyi in uu jiro kala duwanaansho faahfaahinta ah oo saddexda meeloodba uu Bawlos kula wadaagayo markhaati furkiisa, waxay tusinaysaa Luukos oo diiwaan gelinaya is difaacista sharciiyaysan ee Bawlos sida ku sugan Falimaha Rasuullada.

26:14 ka eeg Sharaxa buuxa ee 9:4.

Frank Stagg, *New Testament Theology*, ayaa waxa uu qorayaa sadar ku saabsan xidhiidhka muhiimka ah ee ka dhexeeya Ciise iyo kaniisaddiisa.

“Xaqiiqada ugu muhiimsan ee ku saabsan xukunku waxa weeyi iyada oo la inagu xukumay xidhiidhka aan la leenahay Masiixa. Dhinac kalena waxa weeyi xukun xidhiidh la leh dadkiisa. Xidhiidhka runta ah ee aan isaga la leenahay waxa ka tarjumaya xidhiidhka aan la leenahay dadkiisa. In aan isaga u adeegno waxay ka dhigan yahay inaga oo u adeegna dadkiisa, haddii aan iska indho tirnana waxay ka dhigantahay inagoo isaga iska indho tirnay (Matayos. 25:31-46). Axdiga Cusubi marnaba ma ogola inuu qof jaro xidhiidhka uu Masiixa kula leeyahay dadka kale. iyagoo la silciyaana waxa ay ka dhigantahay isaga oo la silciyay (Fal 9:1-2,4-5; 22:4,7-8; 26:10-11,14-15).

Walaalaha oo lagu denbaabaa waxay ka dhigantahay in lagu danbaabo Masiixa (1 Korintos. 8:12). In kasta oo aynaan ku badbaadin camalladeena, iyaga ayaa hadana la inagu xukumi doonaa; waayo waxay ka tarjumayaan oo muujinayaan xidhiidhka dhabta ah ee aan la leenahay Masiixa iyo nimcadiisa. Xukumitaaku waxa weeyi naxariis ka timaadda xaggooda oo aqbasho xukunka iyadoo xukumitaankuna naxariis u yahay kuwa naxariista leh (Matayos. 5:7)” (p. 333).

▣ **“afka Cibraaniga”** Saddexda markhaatifuriseed ee Bawlos kuna sugan Falimaha Rasuullada, halkani waa meesha keliya ee sheegaysa Ciise oo ku hadlay luqada Aramaatiga. Ka eeg sharraxa buuxa ee 22:2.

▣ **“Sawlosow, Sawlosow”** Tani waa badhka ugu danbeeya aayadda 14 iyo qaybta ugu danbaysa aayadda. 15, sida aayadaha. 16-18, ay yihiin xigasho Ciise uu kula hadlay Bawlos markii uu ku socday Dimishiq.

▣ **“Way kugu adag tahay inaad harraatidid wax ku muda”** Weedhani waxay halkan ku tahay mid gaar ah, waxaana suuro gala inay ahayd maahmaah Giriig ama Laatiin ah oon ahayn Yuhuud. Bawlos hadiyo goor waxa uu ogsoonaan dhegaystayaasha uu la hadlayo iyo sida uu ula xidhiidhayo iyaga! tanina waxa ay sheegaysaa

1. ul loo isticmaalo hagitaanka dibida jiidaysa waxa beeraha lagu qodo ama waxa la midka ah
2. waxyaaho lagu xidho xayawaanka oo ka ilaalinaya inuu dib wax u harraatiyo.

Maahmaahdan waxa loo isticmaalay aadanaha isku dayaya inay hor istaagaan ujeedooyinka Ilaah.

26:15 ka eeg sharraxa buuxa ee 9:5.

▣ **“Ciisaha aad silcinaysid”** Waxa ay tusinaysaa middani xidhiidhka dhow ee u dhexeeya Ciise iyo kaniisaddiisa, (cf. Matayos. 10:40; 25:40,45). Iyagoo la silciyaa waxay ka dhigantahay isaga oo la silciyay!

26:16 **“laakiin bal sara joogso, oo cagahaaga ku istaag”** Waxa weeyi falal amar ah labaduba. Waxa ay u muuqataa inay u dhowdahay yeedhitaankii nebinimada ahaa ee Yeremyaah 1:7-8 iyo Yexesqeel 2:1,3.

▣ **“sababtan aawadeed ayaan kuugu muuqday”** Ilaah waxa uu Bawlos ka lahaa ujeedo gaar ah. rumaysad yeelashada Bawlos iyo yeedhitaankiisu waxa weeyi mid aan caadi ahayn. naxariista Ilaah waxa ay u shaqaysaa sida uu Ilaah u doorto u adeegitaanka boqortooyada iyo koritaankeeda.

▣ **“sababtan aawadeed ayaan kuugu muuqday ...waxyaalaha aan kuugu muuqan doonaba”** Labadaniba waa qaababka *horaō*. Ka hore waa al tegay oo mafcuulku soo horreeyo, ka labaadna waa fal mustaqbal ah. Waxa uu tusinayaa macnuhu Ciise oo Bawlos u ballan qaadaya inuu mustaqbalka la kulmi doono isaga. Bawlos waxa uu helay riyoooyin Ilaahi ah oo badan intii uu waday adeeggiisa (cf. 18:9-10; 22:17-21; 23:11; 27:23-24). Bawlos sidoo kale waxa uu sheegayaa wakhti tabo bara oo ahaa Carabiya dhexdeeda oo halkaas uu Ciise wax ku baray (cf. Galatiya. 1:12,17,18).

▣ **“kaagaga dhigo”** Macnaha caadiga ah waa “aan gacanta kuu gelin doonaa.” Waxa weeyi hadal loo adeegsado awoodda (cf. 22:14; 26:16).

▣ **“midiidin iyo markhaati”** Ereyga hore waxa uu macnaha caadiga ah ku sheegayaa “ka adeegaha” markab dushiis. Waxaana loo isticmaali karaa adeegaha.

Ereyga labaad ee, *martus*, waxa aan ka helaynaa erayga Ingiriisida ah ee “martyr.” Waxaanu leeyahay labo macne:

1. markhaati (cf. Luukos 11:48; 24:48; Fal 1:8,22; 5:32; 10:39,41; 22:15)
2. shahiid (cf. Fal 22:20)

Labaduba waxay ahaayeen khibrad ay arkeen badanaa Rasuullada iyo kuwo badan oo rumaystayaasha ka mid ahi casri kastaba.

26:17 **“kaa samato bixinaya”** Waa fal wakhti xaadirka jooga. Waxa loogala jeedaa doorasho, caadi ahaanna waxa loo tarjumay “samatabixin ama badbaadin” (cf. 7:10,34; 12:11; 23:27). Halkan waxa ka muuqata daryeelka

Ilaah. Bawlos wintii uu adeegayayna waxa uu helay riyooyin dhowr ah oo isaga dhiirri geliyay. Waxa suurto gal ah in middani ay u noqonayso Sabtuujantiga Ishacyaah. 48:10 ama waxa suuro gal ah Yeremyaah. 1:7-8,19.

▣ **“dadka iyo quruumaha”** Bawlos waxa soo food saari doontay diidmo kaga timaadda labada kooxoodba (cf. II Korintos. 11:23-27).

▣ **“aan kuu diri doonaba”** “anigu” halkan waa xoojin (*ego*) sida aayadda. 15. Falku waa *apostellō* (fal wakhti xaadirka jooga), oo ah ka uu ka yimid ereyga “Apostle.” Sida uu Aabbuhu u diray Ciise, ayaa Ciisena u dirayaa markhaatiyadiisa, rasuullada (cf. Yooxanaa 20:21).

26:18 “furtiduga soo jeestaan” Waa labo fal oo aan dhamaad lahayn. waxa laga yaabaa inay u noqonayso Ishacyaah. 42:7. Masiixu waxa uu furi doonaa indhaha kuwa indhaha la’ iyada oo lagu shabahayo indho la’aanta ruuxiga ah (cf. Yooxanaa 9). Aqoonta injiilka iyo fahankiisa waa in ay ka horrayso yeedhitaan iyo ka jawaab celin (tawbad keen iyo iimaan). Shaydaanku waxa uu isku dayayaa inuu xidho maankeenna iyo qalbiyadeenna (cf. II Korintos. 4:4) Ruuxuna waxa uu isku dayaa inuu furo (cf. Yooxanaa 6:44,65; 16:8-11).

▣ **“gudcur uga soo jeestaan ...inay ka soo leexdaan xoogga Shayddaanka”** Fiiro u yeelo is barbardhigista. “xoogga” waa ereyga Giriigga ah ee *exousia*, hadiyo goorna waxa loo tarjumaya awood (cf. NKJV, NRSV, TEV). Dunida waxa saamayn ku leh sharka shakhsi ahaaneed (cf. Efesos. 2:2; 4:14; 6:10-18; II Korintos. 4:4; Kolosay. 1:12-13, ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 5:3).

Axdiga Hore dhexdiisa, gaar ahaan waxsii sheegista Ishacyaah, Masiixu (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:31) waxay ahayd kuwa indhaha la’a oo loo furo indhaha. Waxa ay ahayd waxsii sheegis isugu jirta tusaale ahaan iyo xaqqiyo (cf. Ishacyaah. 29:18; 32:3; 35:5; 42:7,16).

MAWDUUC GAAR AH: AWOOD (EXOUSIA)

Waxa xiiso leh in loo fiirsado sida Luukos u isticmaalay *exousia* (awood, ama xukun sharci ah).

1. sid ku sugan 4:6 Shaydaanku waxa uu sheeganayaa inuu Ciise siinayo awood.
2. sida ku sugan 4:32,36 Yuhuuddu waxay ka yaabeen sida Ciise wax u barayo isagoo adeegsanaya awooddiisa shakhsi ahaaneed.
3. sida ku sugan 9:1 waxa awooddiisa uu siinayaa Rasuulladiisa.
4. sida ku sugan 10:19 waxa uu awooddiisa siinayaa toddobaatanka adeegayaal.
5. sida ku sugan 20:2,8 waxa la iswaydiiyay waxa udub dhexaadka u ah awoodda Ciise.
6. sida ku sugan 22:53 sharka waxa loo oggolaaday inuu xukumo oo dilo Ciise.

Inkasta oo Luukos iyo Matayos hordhacooda ku saabsan Adeegga Wayn, “Awoodda samada samada iyo dhulkaba anaa la isiiyay,” Although not in Luke, Matthew’s introduction to the Great Commission, “all authority has been given to Me in heaven and on earth,” waxa weeyi hadal la yaab leh (Matayos. 28:18).

Ciise siduu su’aashooda uga jawaabay waxay noqonaysay

1. Hadalladii Ilaah ku hadlay markii
 - a. baabtiiskiisa (Luukos 3:21-22)
 - b. is bedelitaankiisa (Luukos 9:35)
2. Waxsii sheegidda Axdiga Hore ee la dhammaystiray
 - a. qabiilka Yahuudah (cf. Gen. 49:10)
 - b. qoyska Yesay (cf. II Samuu’eel 7)
 - c. ku dhashay Beytlaxam (cf. Miikaah 5:2)
 - d. dhashay wakhtigii boqortooyadii afraad (Rooma) ee Daanyeel 2
 - e. caawiyay saboolka, kuwo indo la’aanta ah, kuwa baahida qaba (Ishacyaah)
3. jinni saaristiisu waxay tuisay awooddiisa oo ka sarraysa Shaydaanka iyo boqortooyadiisa.
4. dhimashada uu ka sarakacay waxay tuisay awooddiisa ka sarraysa dhimashada.
5. mucjisooyinkiisa oo dhami waxay muujinayaan awooddiisa aadka u sarraysa.
 - a. dabiicadda
 - b. quudinta
 - c. bogsiiinta
 - d. Ogaanshaha waxa maanka ku jira
 - e. soo qabashada kalluunka

▣ **“oo ay iftiinka ugu soo jeestaan...oo ay Ilaah u yimaadaan”** Fiiro u yeelo is barbardhigidda. Dadkii hore waxa ay ka baqan jireen mugdiga. Waxa uu tusaale u ahaa sharka. Dhinaca kalena iftiinku waxa uu tusaale u ahaa runta, bogsiinta iyo nadiifsanaanta. Is barbardhig iftiinka ku saabsan oo injiilka ah ayaa waxa uu ku sugan yahay 3:17-21.

▣ **“inay helaan”** falkani waxa weeyi falka wakhtiga tegay ah oo aan dhammaad lahayn. Giriigga kuma jirto “inay” (cf. TEV, NJB). Xaaladda keliya ee macnaha halkan ka muuqataa waa “rumaysadka ay igu leeyihiin” taasi oo jumlada ugu danbaysa la dhigay qoraalka Giriigga. Dhammaanba barakada Ilaah waxa ay ku tiirsantahay ka jawaab celinta rumaysadka (i.e., aqbal, cf. Yooxanaa 1:12) nimcadiisa (cf. Efesos. 2:8-9). Tani waxa weeyi Axdiga Cusubi meesha uu kaga duwanyahay axdiga shuruudda ah ee ku sugan Axdiga Hore.

▣ **“dembidhaaf”** Luukos waxa uu isticmaalayaa ereygan (*aphesis*) marar badan.

1. Luukos 4:18 waxa loogu isticmaalay Axdiga Hore iyadoo ah xigasho ka ahaatay Ishacyaah. 61:1, halkaasoo ay kaga dhigantahay sii dayn, taasi oo ka tarjumaysa LXX isticmaalkiisa Baxniintii. 18:2 iyo Laawiyiintii. 16:26.
2. Luukos 1:77; 3:3; 24:47; Fal 2:38; 5:31; 10:43; 13:38; 26:18, waxa ay ka dhigantahay “ka dhaafitaanka denbiga,” oo ka tarjumaysa LXX isticmaalkiisa Sharciga Kunoqoshadiisa. 15:3, halkaasoo loogu isticmaalay ka dhaafitaanka denbiga.

Isticmaalkiisa Luukos waxa laga yaabaa inuu ka tarjumayo ballan qaadka Axdiga Cusub ee Yeremyaah. 31:34.

▣ **“oo ay dhaxal la helaan”** Waa ereyga Giriigga ah ee *klēros*, kaasi oo tusinaya faa’iido imanaysa (cf. Laawiyiintii. 16:8; Yoonis 1:7; Fal 1:26) oo ah dhaxaltooyo, sida ku sugan Bilowgii. 48:6; Baxniintii. 6:8; iyo Yashuua. 13:7-8. Axdiga Hore dhexdiisa Laawiyiintu may lahayn dhul ay dhaxlaan, waxa jiray oo keliya 48 magaalo oo Laawiyiint ah (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 10:9; 12:12), laakiin Rabbiga laftiisa ayaa ahaa dhaxalkooda (cf. Tirintii. 18:20). Imika Axdiga Cusub dhexdiisa rumaystayaasha oo dhami waa wadaaddo (cf. I Butros. 2:5,9; Muujintii. 1:6). Rabbiga (YHWH) waa dhaxalkeenna; waxaynuna nahay carruurtiisa (cf. Rooma. 8:15-17).

▣ **“kuwa qodus lagaga dhigay”** Kani waa fal dhammaystiran oo mafcuulku soo horreeyo. Rumaystayaashu waxa ay yihiin oo ay noqon doonaan kuwo quduus lagaga dhigo rumaysadkooda ay ku leeyihiin Masiixa (cf. 20:21). Ka eeg Mawduuca Gaarka ah 9:32. Shaydaanka iyo xoogaggu toona middan kama fogayn karaan (cf. Rooma. 8:31-39).

NASB (UPDATED) TEXT: 26:19-23

¹⁹Sidaas daraaddeed. boqor Agribbow, kuma aan caasiyoobin riyadii samada ka timid; ²⁰laakiin waxaan horeba ugu sheegay kuwii joogay Dimishaq iyo Yerusaaalem iyo dalka Yahuudiya oo dhan iyo weliba dadka aan Yuhuudda ahayn, inay toobad keenaan oo ay Ilaah u soo noqdaan, iyagoo samaynaya shuqullo toobad istaahila. ²¹Waxyaalahaas aawadood baa Yuhuuddu macbudka gudhiisa iigu qabteen, oo waxay isku dayeen inay i dilaan. ²²Haddaba anigoo caawimaad ka helay xag Ilaah ayaan waxaan ilaa maanta u taaganahay inaan marag furo oo aan u sheego yar iyo weynba. anigoo aan innaba wax kale sheegayn wixii nebiyadii iyo Muuse ay sii sheegeen inay ahaan doonaan mooyaane ²³taasoo ah in Masiixu xanuunsan doono, iyo sida isagoo ah kii kowaad oo kuwii dhintay ka soo sara kacay uu iftiin ugu naadin doono dadka iyo quruumahaba.

26:19 “Sidaas daraaddeed. boqor Agribbow” Eeg sharaxa 25:13, hordhaca. Bawlos waxa uu isku dayay inuu ninkan ku wacdiyo injiilka (cf. aayadaha. 26-29).

▣ **“kuma aan caasiyoobin”** Ereyga Giriigga ah ee *peithō* waxa uu ka yimid magaca ilaahadda qancinta. Macnaha halkan waxa ay ku haysataa arrin tusinaysaa diidmada “addecis darro” (cf. Luukos 1:17; Rooma. 1:30;

II Timoteyos. 3:2; Tiitos 1:16; 3:3). Haddaba, waxay ahayd jid xooggan oo luqada Giriiggu ee Koine ay ku tusinayso diiditaanka wax, laakiin macnaha halkan waxa weeyi qaab lagu toosinayo xoojinta addeecitaanka Bawlos.

▣ **“riyadii samada ka timid”** Waxa ay sheegaysaa riyadii Bawlos markii uu ku socday Dimishiq halkaasoo uu kula kulmayo Masiixan la sarakiciyay.

26:20 “Dimishaq .. Yeruusaalem” Eeg Fal 9:19-25,27 ee adeegitaankii Bawlos ee Dimashaq; 9:26-30 adeegitaankii Bawlos ee Yeruusaalem iyo waxa suuro gal ah 9:31 adeegii Bawlos ka waday Yahuudiya.

▣ **“inay toobad keenaan oo ay Ilaah u soo noqdaan”** Farriinta Bawlos (cf. Fal 20:21) waxa ay la mid ahayd

1. Yooxanaa Baabtiisaha (cf. Matayos. 3:1-12; Markos 1:4-8)
2. Farriintii Ciise ee hore (cf. Markos. 1:15)
3. Butros (cf. Fal 3:16,19)

Ereyga Giriigga ah ee towbad keen waxa loogala jeedaa bedelitaanka maanka. Xagga Cibraanigana waxa ay ka dhigantahay beddelka camalka, labadubana waxay koobsanayaan towbad keenka runta ah. ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 2:38. Labada wax ee Axdiga Cusubi ugu baahanyahay (sidoo kale Axdiga Hore ayaa dalbanaya) badbaadada ayaa ah towbad keen (ka jeedsashada denbiga iyo waxa xun) iyo rumaysad (Ilaah oo loogu laabto Masiixa).

▣ **“iyagoo samaynaya shuqullo toobad istaahila”** Qaab nololeedka rumaystuhu (fal wakhti xaadirka jooga) uu ku ansixinayo sida uu ugu heellan yahay rumaysadkiisa ugu horreeya (cf. Matayos. 3:8; Luukos 3:8; Efesos. 2:8-10, Yacquub iyo I Yooxanaa). Ilaah waxa uu rabaa dad ka tarjuma dabeecaddiisa. Rumaystayaashana waxa laga rabaa inay ku dheehnaadaan la midnimada Masiixa (cf. Rooma. 8:28-29; Galatiya. 4:19; Efesos. 1:4; 2:10). Injiilku waa

1. shakhsi lasoo dhoweeyo
2. xaqiiqo ku saabsan shakhsigaas la rumaysanayo
3. nolol la mid ah ta shakhsigaasi ku nool yahay.

26:21 May ahayn aragtida fiqi ahaaneed ee Bawlos, laakiin waa wacdintiisa iyo kusoo daristiisa “kuwa aan Yuhuudda ahayn”(aayadda 20) arrinta keentay kacdoonka Macbadka dhexdiisa.

▣ **“tried to put me to death”** This is an IMPERFECT MIDDLE (deponent) INDICATIVE (tried again and again) with an AORIST MIDDLE INFINITIVE (to kill). The Jews (cf. Acts 9:24) from Asia (cf. 20:3,19; 21:27,30) tried to kill Paul several times.

▣ **“oo waxay isku dayeen inay i dilaan”** Waa fal aan dhammaystirnayn oo wax tusinaya (isku dayay marar badan) oo uu la socdo fal wakhti tegay ah oo aan dhammaad lahayn (inay dilaan). Yuhuuddii (cf. Fal 9:24) reer Aasiya(cf. 20:3,19; 21:27,30) waxay isku dayeen inay dilaan Bawlos marar badan.

26:22 “inaan marag furo oo aan u sheego yar iyo weynba” Waxa weeyi hadal Semeti ah oo koobsanaya cid kasta. Waxa weeyi Bawlos oo sheegaya (sida Butros, cf. 10:38) inuu isagu sida Ilaah aanu tix gelinayn shakhsiyadda qofka (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa. 10:17; II Taariikhdii. 19:7, ka eeg sharraxa buuxa ee 10:34). Waxa uu wacdinayaa dadka oo dhan.

▣ **“anigoo aan innaba wax kale sheegayn wixii nebiyadii iyo Muuse ay sii sheegeen”** Bawlos waxa uu sheegayaa in farriintiisa iyo dhegaystayaashiisu (i.e., kuwa aan Yuhuudda ahayn) maaha wax cusub, laakiin waa waxsii sheegidda Axdiga Hore. Waxa uu si fudud u raacayaa waxyaalaha uu sheegayo Axdiga Hore (ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 1:8), ee ah ballan qaadyada iyo xaqiiqooyinka.

26:23 Fiiro u yeelo iyada oo farriinta Bawlos ay ka koobnayd saddex qaybood:

1. Masiixu waxa uu u silcay cafiska dadka aawadiis

2. Sarakicista Masiixu waxay ahayd midhihi u horreeyay rumaystayaasha sarakicistooda oo dhan.

3. warkan wanaagsani waxa uu u ahaaday Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn labadaba.

Saddexdan waxyaalood ee fiqi ahaaneed waxa ay la xidhiidhaan aayadda 20 oo tusinaysa sida aan shakhsi ahaan u aqbalayno Masiixa (towbad keen, ka jeesashada denbiga, iimaan, iyo Ilaah oo loogu jeesto Masiixa).

▣ **“in Masiixu xanuunsan doono”** waa arrintaa asaasiga u ahayd fiqiga Rasuullada wacdimohooda ee ku sugan Falimaha Rasuullada, eeg Mawduuca Gaarka ah ee 2:14. Waxa ay ahayd arrinta hortaagnayd Yuhuudda (cf. I Korintos. 1:23), laakiin Axdiga Hore ayaa sii sheegay (cf. Bilowgii. 3:15; Sabuurka 22; Ishacyaah 53). Xaqiiqadan oo kale waxa laga helayaa Luukos 24:7,26,44-47.

Ereyga Giriigga ah ee “Masiixu” waxa uu ka tarjumayaa magaca Cibraaniga ah ee “Messiah.” Bawlos waxa uu sheegayaa in Ciise oo isku tallaabta lagu qodbay, uu ahaa Masiixa runta ah, oo ah ka laballan qaaday, ka la Subkay (cf. 2:36; 3:6,18,20; 4:10,26; 13:33; 17:3; 26:23, eeg Mawduuca Gaarka ah: Masiixa 2:31).

▣ **“kuwii dhintay ka soo sara kacay”** Qoraalkan dartiis iyo Rooma 1:4, waxa jirtay bidco la sameeyay oo loogu magac daray “korsashada”, taasi oo tusinaysay in Ciise lagu abaal mariyay nolol wanaagsan oo ah in laga sara kiciyay kuwa dhintay. Si kastaba ha ahaatee, kuwani waxay iska indho tireen dhammaanba qoraallada ku saabsan jiritaankiisii hore, sida Yooxanaa 1:1; Filiboy. 2:6-11; Kolosay. 1:15-17; iyo Cibraaniyada. 1:2-3. Ciise marwalba wuu jiray; waxa uu marwalba ahaa ilaah; waxa uu soo qaatay jidh bani aadam.

▣ **“iftiin”** Iftiinka waxa lagu tusaalayn jiray runta iyo nadiifsanaanta (cf. aayadda. 18; Ishacyaah. 9:2; 42:6-7).

▣ **“dadka iyo quruumahaba”** Waxa jira hal injiil oo u ahaaday labada kooxoodba (cf. Efesos. 2:11-3:13). Waxa weeyi qarsoodiga laga qariyay casriyada, laakiinse hadda si buuxda loogu dhex muujiyay Masiixa. aadanaha oo dhan waxa laga sameeyay ekaanshaha muuqaalka Ilaah waaxidka ah (cf. Bilowgii. 1:26-27). Bilowgii 3:15 waxa ay ballan qaadaysaa in Ilaah uu siin doono badbaado aadanaha leexday. Ishacyaah ayaa waxa uu xoojinayaa caalaminiimada Masiixa (e.g., Ishacyaah. 2:2-4; 42:4,6,10-12; 45:20-25; 49:6; 51:4; 52:10; 60:1-3; iyo sidoo kale Miikaah. 5:4-5).

NASB (UPDATED) TEXT: 26:24-29

²⁴Oo intuu saas isu daafacayay, ayaa Feestos cod weyn ku dhawaaqay oo yidhi, Bawlosow, waad waalan tahay. Barashadaadii badnayd ayaa waalli kuu beddeshay. ²⁵Laakiin Bawlos wuxuu yidhi, Feestokii aad u sarreeyow, anigu ma aan waalni, laakiin waxaan ku hadlayaa erayo run ah iyo feeyignaan. ²⁶Waayo, boqorka aan ikhtiyaar ula hadlayaa wuu garanayaa waxyaalahan; waayo, anigu waxaan hubaa inaan waxyaalahan midkoodna uusan isaga ka qarsoonayn: waayo, waxyaalahan laguma samayn meel qarsoon. ²⁷Boqor Agribbow. nebiyadii ma rumaysan tahay? Waan ogahay inaad rumaysan tahay. ²⁸Markaasaa Agribba wuxuu Bawlos ku yidhi, Wax yar baad igu oggolaysiinaysaa inaan Masiixi noqdo. ²⁹Kolkaasaa Bawlos wuxuu y idhi, Waxaan Ilaah ka dooni lahaa in, haddii ay tahay wax yar iyo haddii ay tahay wax badan, ayan ahayn adiga oo keliya. laakiin in, inta maanta i maqlaysaa oo dhammu, ay wada noqdaan sida aan ahay oo kale, silsiladahan mooyaane.

26:24 “ayaa Feestos cod weyn ku dhawaaqay” Farriinta Bawlos waxay isaga u ahayd wax aan la rumaysan karin. Aragtiidiisa iyo dhaqankiisa uu dunida ka haysto waxa ay u suurto geliyeen inuu fahmo.

▣ **“Barashadaadii badnayd ayaa waalli kuu beddeshay”** Waxa ay tani tusinaysaa in qotodheerida, caddaanta, iyo qancinta ku jirta is difaacista Bawlos.

26:25 “erayo run ah iyo feeyignaan” Ereyga Giriigga ah ee *sōphrosunē* waxa uu ka imanayaa labada kelmadood ee Giriigga ah, “cod” iyo “maan.” Waxa ay ka dhiganyihiin qaab isu dheelli tiran oo ah nolosha iyo fikirka. Waxa weeyi “waxa kasoo baxa maankaaga” iyo “waalli” (cf. aayadda. 24).

▣ “runta” eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: “RUNTA’ MARKA LA EEGO QORAALLADA BAWLOS

Bawlos eraygan wuu isticmaalayaa isaga oo adeegsanaya qaabka ay ugu dhigantahay Axdiga Hore, waana *emet* oo macneheedu yahay kalsooni iyo iimaan qabid (BDB 53). Qoraallada Yuhuudda waxay ka tarjumaysaa in loo isticmaali jiray kala saarista runta iyo beenta.

Bawlos ereygan wuxuu u adeegsanayaa muujinta xaqiiqada injiilka iyo Ciise Masiix:

1. Rooma 1:18,25; 2:8,20; 3:7; 15:8
2. 1 Korintos 13:6
3. 2 Korintos 4:2; 6:7; 11:10; 13:8\
4. Galatiya 2:5. 14; 5:7
5. Efesos 1:13; 6:14
6. Kolosay 1:5,6
7. 2 Tesolonika 2:10,12,13
8. 1 Timoteyos 2:4; 3:15; 4:3; 6:5
9. 2 Timoteyos 2:15,18,25; 3:7,8; 4:4
10. Tiitos 1:1, 14

Bawlos wuxuu eraygan u adeegsanayaa isagoo muujinaya inuu ku hadlayo wax sax ah:

1. Falimaha Rasuullada 26:25
2. Rooma 9:1
3. 2 Korintos 7:14; 12:6
4. Efesos 4:25
5. Filiboy 1:18
6. 1 Timoteyos 2:7

Waxa kaloo uu u isticmaalayaa ujeedooyinkiisa 1Korintos 5:8 iyo qaab nololeedka Efesos 4:24; 5:9; Filiboy 4:8, sidoo kalena mararka qaar wuxuu u isticmaalayaa dadka:

1. Ilaah, Rooma 3:4 (Yooxanaa 3:33; 17:17)
2. Ciise, Efesos 4:21 (sida Yooxanaa 14:6)
3. Markhaatinimada Rasuulnimada, Tiitos 1:13
4. Bawlos, 2 Korintos 6:8

Bawlos oo keliya ayaa isticmaalaya qaabka ficilka ah (i.e., *al’theo*) sida ku sugan Galatiya. 4:16 iyo

Efesos. 4:15, halkaasoo ay ku tilmaamayso injiilka. Diraasadayn dheeraada waxaad kala tashataa Colin Brown (ed), *The New International Dictionary of New Testament Theology*, vol. 3, pp. 784-902.

26:26-28 “boqorka aan ikhtiyaar ula hadlayaa wuu garanayaa waxyaalahan” Waxa jirtay falaqayn badan oo ku saabsan aayaddan. Bawlos waxa uu rabay inuu isticmaalo Agribba II si uu markhaatifurkiisa u ansixiyo haddii suuro gal ay noqotana uu isagu u aqbaloo runta uu sheegayo. Aayadda 28 waxa loo tarjumi karaa, “Ma waxa aad iga rabtaa in aan noqdo marag Masiixi ah?”

26:26 “anigu waxaan hubaa” Luukos waxa uu marar badan ku isticmaalayaa weedhan Falimaha Rasuullada, hadiyo goorna waxay la xidhiidhaa Bawlos (cf. 9:27,28; 13:46; 14:3; 18:26; 19:8). Caadi ahaan waxa loo tarjumay “dhiirraanaan ku hadlis” (cf. I Tesaloniika. 2:2). Tani waxa weeyi mid ka mida ka buuxsanaanta Ruuxa. Waxa weeyi midda uu Bawlos ku baryayo sida ku sugan Efesos. 6:20. Injiilka oo dhiirraanaan lagu wacdiyaa waxa weeyi ujeedada uu Ruuxu ka leeyahay rumayste kasta.

▣ **“waxyaalahan laguma samayn meel qarsoon”** Butros ayaa sidan oo kale caddeeyay marar badan isaga oo kula hadlayay dhegaystayaashiisii ku sugnaa Yerusaaalem (cf. 2:22,33). Xaqiiqooyinka injiilku waxay ahaayeen kuwo lagusoo celceliyo oo taariikhi ah.

26:27 Bawlos waxa uu garanayay in Agribba uu aqoon u lahaa Axdiga Hore. Waxa uu Bawlos sheeganayaa in injiilkiisa farriintiisu ay ahayd mid la xidhiidha Qorniinka Axdiga Hore. May ahayn wax “cusub” ama “been abuur” farriin ah, Laakin waxa uu ahaa waxsii sheegis la dhammaystiray.

26:28

NASB “Wax yar baad igu oggolaysiinaysaa inaan Masiixi noqdo”

NKJV “waxaad ku dhowaatay inaad igu qanciso inaan Masiixi noqdo”

NRSV “ma sidan dhaqsaha ah ayaad rabaa inaad igu qanciso inaan Masiixi noqdo”

TEV “ma wakhtigan gaaban ayaad filaysaa inaad igaga dhigayso Masiixi”

NJB “Xoogaa sii wad, oo dooddaaduna waxay iga dhigi doontaa Masiixi”

Waxa jira ikhtiyaar qaamuuska ah oo lagu kala dooran karo sida loo fahmayo *oligō* (macnihiisu yahay waxyar), “waxyar” (NASB, NRSV, TEV), ama “karti yar” (NKJV, NJB). Wareerkan oo kale waxa laga helayaa aayadda. 29.

Sidoo kale waxa jira kala duwanaansho xagga qoraal gacmeedka ah oo middan la xidhiidha: “in la sameeyo” ama “laga dhigo” (*poieō*) sida ku sugan qoraal gacmeedyada P⁷⁴, x, A (UBS⁴ ku waxa uu ku bixiyayaa “A”), ama “noqosho” sida ku sugan MS E iyo tarjumaadaha Vulgate iyo Peshitta.

Macnaha ka muuqda tuducu waa uu cad yahay. Bawlos waxa uu doonay inuu injiilka uga hadlo si kuwa ogsoon Axdiga Hore (Agribba) ay u qirtaan ama ugu yaraan ay u ogaadaan waxsii sheegyadan Axdiga Hore.

▣ **“Masiixi”** Dadka “Jidka” (kuwa raaca Masiixa) waxa ugu horrayn Masiixiyiin loogaga magacaabay Antiyokhdii Suuriya (cf. 11:26). Meesha keliya ee kale ee magacani uu kaga dhex muuqanayo Falimaha Rasuullada, waxa odhanaya Agribba II, taasi oo ka dhigan in magacani uu caan noqday.

26:29 “Waxaan Ilaah ka dooni lahaa” Aayadda 29 waa mid aan dhammaystirnayn oo ah jumlad shuruudeed heerka afraad ah (*an* oo doonisi la socoto), taasi oo soo bandhigaysa doonis u dhow inay rumowdo. Caadi ahaan waxa weeyi duco ama ididiilo. Bawlos waxa uu dhegastayaashan oo dhan, Roomaan iyo Yuhuud intaba la damacsanaa inay sidiisa oo kale u rumaystaan Masiixa.

NASB (UPDATED) TEXT: 26:30-32

³⁰Markaasaa boqorkii kacay iyo taliyihii iyo Bernikee iyo kuwii la fadhiyey oo dhammu: ³¹oo kolkii ay baxeen ayaa midba midkii kale la hadlay. oo waxay isku yidhaahdeen, Ninkanu innaba ma uu samayn wax istaahila dhimasho iyo silsilado toona. ³²Markaasaa Agribba wuxuu Feestos ku yidhi, Ninkan waa la sii dayn kari lahaa haddii uusan Kaysar u ashtakoon

26:30 Sidee Luukos uu ku helay warbixintan? Waxa ay ahayd sheeko gaara oo u dhaxaysa hoggaamiyayaasha dawladda (iyo qoysaskooda).

1. adeege ayaa maqlay oo Luukos u sheegay?
2. Luukos waxa uu u arkay waxa ay sheegeeni inuu taxane yahay.
3. Luukos jaaniskan waxa uu u isticmaalayaa inuu xoojiyo ujeedadiisa ah in Bawlos iyo Masiixiyaddu toona aanay hanjabaad ku ahayn Roomaanka.

26:31-32 “Ninkan waa la sii dayn kari lahaa haddii uusan Kaysar u ashtakoon” Tani waxa ay tusinaysaa mid ka mida ujeedooyinka muhiimka ah ee Luukos u qoray Falimaha Rasuullada, taasi oo ahayd in Masiixiyaddu aanay khatar ku ahayn Roomaanka. Waa jumlad shuruudeed heerka labaad ah, taasi oo sheegitaan beena ka dhigaysa xoojinta xaqiiqo. Ninkan waa lasii dayn lahaa (taasi oon ahayn) haddii aanu u ashkatoonin Kaysar (taasi oo uu sameeyay).

SU’AALO FALQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sidee is difaacitaankani uga duwanyahay isku hor difaacistii Feestos iyo Feelikos?
2. Sidee markhaatifurkii shakhsi ahaaneed ee Bawlos ugu habboontahay is difaacitaankiisa?
3. Maxay Yuhuuddu ugasoo horjeedeen Masiixa silcaya?
4. Aayadda 28 maxay fasiraaddeedu u adagtahay?
5. Sidee doodda Feestos, Agribba iyo Bernikee (aayadaha. 30-31) ay ugu habboontahay Luukos ujeedada uu uga socdo Falimaha Rasuullada?

FALIMAHA RASUULLADA 27

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos wuxuu u shiraacday Rooma	U socdaalitaankii Rooma	U socdaalitaankii Malta	Bawlos wuxuu u shiraacday Rooma	U kicitaankii Rooma
27:1-8	27:1-8	27:1-8	27:1-6	27:1-3 27:4-6 27:7-8
	Digniintii Bawlos waa la iska indharitay		27:7-8	27:7-8
27:9-12	27:9-12	27:9-12	27:9-12	27:9-12
Duufaankii Badda	Duufaanka dhexdiisii		Kicitaankii badda	Duufaankii qarqoomitaankii
27:13-20	27:13-38	27:13-20	27:13-20	27:13-20
27:21-26		27:21-26	27:21-26	27:21-26
27:27-32		27:27-32	27:27-32	27:27-32
27:33-38		27:33-38	27:33-38	27:33-38
Qarqoomitaankii	Qarqoomitaankii Malta		Qarqoomitaankii	
27:39-44	27:39-44	27:39-44	27:39-41 27:42-44	27:39-41 27:42-44

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Luukos waxa uu aqoon u lahaa doonyaha (A. T. Robertson, *Word Pictures in the New Testament*, vol. 3, p. 456, ayaa leh Luukos waxa uu isticmaalay sagaal erey oo khuseeya *pleō*, shiraacashada)iyo sidoo kale qoraallada, caafimaadka taariikhda, iyo fiqiga. Halkan waxa ah erayo noocaas ah
1. dhoof (cf. 13:4; 14:26; 20:15;27:1)
 2. dabayli hayso (cf. 27:4,7)
 3. barroosinkii (cf. 27:13)
 4. *Yurokludoon* (cf. 27:14)
 5. wejiga siin kari wayday (cf. 27:15)
 6. ku orditaanka dugsi (cf. 27:16)
 7. xidhitaan (cf. 27:17)
 8. bacaadka (*skeuos*) (cf. 27: 17)
 9. alaabtii doonnida (*skeuēn*) (cf. 27:19)
 10. moolkii (cf. 27:28[labojeer])
 11. baac (cf. 27:28[labojeer])
 12. four anchors from the stern (cf. 27:29,40)
 13. xadhkihii shukaanaha (cf. 27:40)
 14. shiraaqii dabaysha u sii daayeen (cf. 27:40)
 15. kacday dabayl koonfureed (MSS P⁷⁴, Ⲙ, A, cf. 28:13)
- B. Kitaab qadiimi ah oo mufasiriinta caawiyay ayaa waxa leh James Smith's *The Voyage and Shipwreck of St. Paul*, 1848.
- C. U socdaalitaankan Rooma waxa la isku dayay wakhti ay khatar tahay dooni raacistu (cf. 27:1,4,7,9,10,14). Caadi ahaan bilaha November-February waxa ay ahaayeen wakhtiyada in la safraa ay tahay khatar waxaana la socday labo toddobaad oo ka horreeya ama ka danbeeya oo khatartu joogto. Doomuhu caadi ahaan marka ay Rooma u socdaan waxa ay ku qaadataa toban ilaa afar iyo toban casho, laakiin maadaama dabayshu ay hagayso waxa ay qaadan kartay lixdan casho.
- D. Waxa jira saddex ilaa afar doomood oo kala duwan laguna sheegay halkan
1. dooni saaxileed istaagtay dekada kasta oo u qaaday meel u dhow xeebta.
 2. labo doomood oo Masaari ah una kala socdaalayey Masar iyo Talyaaniga.
 3. socdaal u dhexeeyay Naples oo ku dhamaanayay 43 mayl meel u jirta koonfurta Rooma.
- Waxa xiiso leh iyada oo waxyaalahan uu Luukos diiwaan gelinayo laga raaco khariidadda ama maabka bariga dhexe

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 27:1-8

¹Haddaba markii la goostay inaannu Itaaliya u dhoofa ayaa Bawlos iyo dhawr kale oo maxaabiis ah waxaa loo dhiibay boqol-u taliye magiciisa Yulyos la odhan jiray oo ka tirsanaa ciidankii boqorka. ²Oo waxaannu fuulnay doonni Adramuteyon ka timid oo u dhoofaysay meelaha xeebta Aasiya ku yaal, markaasaannu dhoofnay oo waxaa nala socday nin Aristarkhos la odhan jiray oo reer Makedoniya ahaa oo Tesaloniika ka yimid. ³Oo maalintii dambe waxaannu nimid Siidoon; markaasaa Yulyos u naxariistay Bawlos oo fasax u siiyey inuu saaxiibbadiis u tago oo uu dhaqaalo ka helo. ⁴Oo haddana halkaas waannu ka dhoofnay, oo waxaannu ka hoos marnay Qubrus, maxaa yeelay. dabayshu waa na haysay. ⁵Oo markii aannu ka gudubnay badda u dhow Kilikiya iyo Bamfuliya. waxaannu nimid Mura oo ku taal Lukiya. ⁶Oo halkaas boqol-u-taliyihii wuxuu ka helay doonni Iskanderiya ka timid oo u dhoofaysa Itaaliya; markaasuu na fuushiiyey. ⁷Oo kolkii aannu maalmo badan aayar soconaynay, waxaannu dhib ku nimid Kinidos horteeda, oo dabayshii ayaa noo diiday inaan hore u sii soconno, kolkaasaannu ka hoos marnay Kereetee oo ka hor jeedda Salmoonee. ⁸Oo markii aannu dhib ku dhaafnay, waxaannu nimid meel magaceeda la yidhaahdo Marsooyin Wanaagsan oo u dhow magaalada Lasaya.

27:1 “Haddaba markii la goostay inaannu Itaaliya u dhofo” Feesto ayaa iyaga diray wakhti ay khatar tahay dooni fuulistu. “anaga” waxa ay tilmaamaysaa Bawlos iyo Luukos (waxa suuro gal ah kuwo kale). badanaa qaybaha koobsanaya “anagu” ee Falimaha Rasuulladu waxa ay wadataa dhoofitaan (cf. 16:10-17; 20:5-15; 21:1-18; 27:1-28:16).

▣ **“dhawr kale oo maxaabiis ah”** Wax kala kama garanayno in ahaayeen maxaabiis Rooma u socota mooyaanee.

▣ **“boqol-u taliye”** Nimanka hadiyo goor dhinaca wanaagsan ayaa loogaga hadlay Axdiga Cusub dhexdiisa (cf. Matayos. 8; Luukos 7; 23:47; Fal 10; iyo maxkamadayntii Bawlos, 21-28).

▣ **“oo ka tirsanaa ciidankii boqorka”** Waxa loo malaynayaa inay ahaayeen ciidammo gaar ahaan boqorku u leeyahay oo u dhexeeyay gobollada iyo Rooma (cf. W. M Ramsay, *St. Paul the Traveler and Roman Citizen*, pp. 315, 348), laakiin tani waxa weeyi malaha keliya ee aan laga qoran Emperor Hadrian (C.D. 117-138).

27:2 “doonni Adramuteyon ka timid” Waxa ay ahayd dooni xeebeed yar oo istaagaysay dekad kasta. Dekada laga lahaa doontanina waxay ahayd Maysiya oo ku taalla Aasiyada Yar. Tanina waa heerka ugu horreeya socdaal Rooma lagu tegayo oo dheer khatarna ah.

▣ **“Aristarkhos”** Waxa uu kasoo jeeday oo uu deganaa Tesaloniika; waxaana suuro gal ah inuu ku laabanayay gurigiisa (cf. Fal 19:29; 20:4; Kolosay. 4:10; Filemon 24). Waxa laga yaabaa in uu la socday Sekundos (cf. 20:4 iyo kuwo ka mida qoraal gacmeedyada Giriigga ee galbeedka).

27:3 “Siidoon” Waxa ay ahayd magaalo ku dhowaad lixdan iyo toddobo mayl woqooyiga ka xigta Kaysariya. Waxa ay ahayd caasimaddi hore ee Fonisiya, laakiinse waxa qariyay bacaad.

▣
NASB “tixgeliyay”
NKJV, NRSV “u naxariistay”
TEV “naxariis u sameeyay”
NJB “u asxaan sameeyay”

Tani waa ereyga lakabka ah ee ka imanaya “jacayl” (*philōs*) iyo “baniadanimi” (*anthropos*). Kelmaddan labo jeer ayaa lagu dhex isticmaalay Falimaha Rasuullada, magaca oo ku jira 28:2 (cf. Tiitos 3:4) iyo falkaabaha oo halkan ah 27:3. Yulyos waxa uu ahaa qof naxariis leh (waana wax lagula yaabo askari Roomaan ah). waxa laga yaabaa inuu maqlay kiiska Bawlos.

▣ **“saaxiibbadiis”** Waxa ay tilmaamaysaa Masiixiyiintii halkaas ku sugnaa. Yulyos waa uu ku kalsoonaa Bawlos, laakiin waxa suurto gal ah inuu raacay askari Roomaan ah oo ilaalo ahi.

▣ **“oo uu dhaqaalo ka helo”** qoraalku ma faahfaaninayo nooca ay tahay taageerada ama dhaqaaluhu (caadifad ahaan, jidh ahaan, dhaqaale ahaan).

27:4 “oo waxaannu ka hoos marnay Qubrus” Tani waa weedh lagu wareerayo maxaa yeelay dadka Ingiriisida akhrisanaya waxa ay ku sababaysaa in ay u maleeyaan “koonfurta Qubrus,” laakiin xaqiiqadii waxa loogala jeedaa woqooyiga. Magacyada kale ee la xusay waxa ay ku yaallaan koonfurta iyo galbeedka Turkiga maanta.

27:6 “doonni Iskanderiya ka timid oo u dhoofaysa Itaaliya” Waxa ay ahayd dooni wayn (waxa ay qaadi kartay 276 qof iyo xamuul badan) oo ka timid Masar una socota Rooma. Dadka casriga ahi waxa ay midan ka garan karaan sawirrada ku yaalla gidaarrada Pompeii iyo qoraallada Lucian ka, ku dhowaad C.D 150. Mayra ayaana ahayd meesha keliya ee doonahani ku xidhan jireen.

27:7 “Kinidos” Waxa ay ahayd magoolo xora oo ku taallay koonfurgalbeeda xeebta gobolka Roomaanka ee Aasiya. Badanaa doomaha Rooma u socdaanay waay isticmaali jireen dekadddan (cf. Thucydides, *Hist.* 8.35). waxa ay lahayd labo dekadood waayo waxa ay ku taallay jasiirad.

▣ **“Salmoonee”** Waxa ay ahayd magaalo ku taallay bariga jasiiradda Kirite. Maadaama oo wakhtigu adkaana waxay isku dayeen inay ku socdaan dhinaca galbeedka iyagoo u dhowaanaya jasiiradda.

27:8 “Marsooyin Wanaagsan” Waxay u dhowayd magaalada koonfureed ee Lasaya oo ku taalla Kirite. Maaha deked laakiin waa xeeb, waxaana adkayd jiilaalka oo dhan in halkan la joogo.

NASB (UPDATED) TEXT: 27:9-12

⁹Markii wakhti badanu dhammaaday, oo haatan dhoofku halis ahaa, maxaa yeelay, Soonkii goor horaa la soo dhaafay, ayaa Bawlos waaniyey iyagii. ¹⁰oo wuxuu ku yidhi, Niman yahow, waxay ila tahay in dhoofkanu lahaan doono waxyeello iyo khasaaro badan, umana ahaan doonaan shixnadda iyo doonnida oo keliya, laakiin xataa nafaheenu khatar bay ku sugan yihiin. ¹¹laakiin boqol-u-taliyihii wuxuu dhegaystay hadalkii naakhudihii iyo ninkii doonnida lahaa intuu dhegaysan lahaa waxyaalihii Bawlos yidhi. ¹²Oo marsadaasu ma ay ahayn mid ku wanaagsan in wakhtiga qabowga la joogo, sidaas daraaddeed ayaa dadkii intiisii badnayd waxay ku talisay in halkaas laga sii dhoofa, haddii si uun lagu gaadhi karo Foynikis oo halkaas wakhtiga qabowga la joogo, taasoo ah marso Kereetee ku taal oo u jeedda woqooyi-bari iyo koonfur-bari.

27:9 Waxa jiray wakhtiyo gaara oo kamida sanakda (bilaha jiilaalka) oo kacdoonka duufaanku uu iman jiray isla markaasna ku socdaalista doomuhu ay ahayd khatar, maadaama oo baddu ay kacsantahay.

▣ **“Soonkii”** Waxa ay tilmaamaysaa Maalinta Raalligelinta (cf. Laawiyiintii 16). Waxa weeyi maalinta soonka ee kelida ah laguna sheegay qoraallada Muuse. Tani waxa ay socdaalka ka dhigaysaa wakhti ah inta u dhaxaysa bisha sagaalaad iyo bisha tobnaad. Bisha tobnaadna waxa ay ahayd bisha ugu danbaysa ku socdaalitaanka badda.

▣ **“Bawlos waaniyey iyagii.”** Waa fal aan dhammaystirnayn kaasi oo tilmaami kara (1) fal soconaya ilaa wakhti tegay ama (2) bilaabitaanka ficil. Sida halkan ka muuqatana waxa ku haboon #2.

27:10 Bawlos waxa uu soo saarayaa digniin gaar ah. si kastaba ha ahaatee, xaqiiqadii middani may imanin. Bawlos ma waxa uu sheegayay aragtidiisa shakhsi ahaaneed (“waxaan u malaynayaa”), mise Ilaah ayaa bedelay maankiisa oo go’aansaday inuu dadka badbaadiyo (cf. aayadda. 24)?

27:11

NASB “naakhudihii iyo ninkii doonnida lahaa”

NKJV “kabtankii iyo kii doonnida lahaa”

NRSV “kii doonnida lahaa iyo naakhudihii”

TEV, NJB “kabtankii iyo ninkii lahaa doonida”

Weedhani waxa ay tilmaamaysaa labo qof oo kala duwan.

1. naakhuudaha (*kubernētēs*), oo ah kabtanka wada doonnida (cf. Muujintii. 18:17)
2. kabtanka (*naukleros*, ka kooban “dooni” [*naus*] iyo “lahaansho” ama “koox” [*klēros*]), inkasta oo ereyga macnihiisu noqon karo “kuwa doonnida leh” (cf. F. F. Bruce, *The Book of Acts*, p. 507, oo soo xiganaya Ramsay, *St. Paul the Traveler*, p. 324, oo soo xiganaya *Inscriptiones Graecae*, 14.918). Koine Papyriga waxa loogu isticmaalay “kabtan.” Farqiga u dhexeeya labadan eray maaha mid la hubo (cf. Louw and Nida, *Greek-English Lexicon*, vol. 1, p. 548 vs. Harold Moulton, *The Analytical Greek Lexicon Revised*, p. 275), laakiin markab ama dooni seeskan leh (dooni xamuuleed laga leeyahay Iksendariya) waxaana jiray dhowr hoggaamiye iyo kuwo ka shaqeeya doonnida.

27:12 “haddii” Waa jumlad shuruudeed heerka afraad ah. kuwii qaatay go’aanka dhoofitaanku waxa ay garanayeen in ay khatar tahay, laakiin waxa loo baahna in ay ku socdaan.

▣ “Foynikis” Waxa weeyi dekad ku taalla dhinaca koonfureed ee Kirete oo ah dhinaca galbeed ee Marsooyin Wanaagsan. Waxa jira shaki laga qabo meesha ay ku taallay (Strabo, *Geography*, 10.4.3 vs. Ptolemy, *An Egyptian Geography* 3.17.3). ilaa hadda waxay u dhoofayeen meel u dhow dhinaca koonfureed ee Kerite.

▣ “oo u jeedda woqooyi-bari iyo koonfur-bari” Dhinaca kale Foynikis waxa jiray labo tuulo oo kala soocan isla markaana uu u dhexeeyay dhul badda ka danbeeya. Dekadi waxay dabaysha ka qaabilaysay dhinac, halka midda kalena ay dhinaca kale kagasoo dhabanaysay. Haddaba sanadka ayaa kolba la eegi jiray ka ku haboon in loo isticmaalo dekad ahaan.

NASB (UPDATED) TEXT: 27:13-20

¹³Oo kolkii dabayshii koonfureed tartiib u socotay ayay waxay u maleeyeen inay qasdigoodii heleen, kolkaasay barroosinkii qaadeen, oo waxay ag mareen Kereetee. ¹⁴laakiin wakhti aan dheerayn dabadeed ayaa waxaa ka soo kacay duufaan weyn oo magiciisa la yidhaahdo Yurokludoon; ¹⁵oo markii doonnidii la qabsaday oo ay wejiga siin kari weyday dabaysha, ayaannu iska dhiibnay, kolkaasay na kaxaysatay. ¹⁶Oo waxaannu ku orodnay gasiirad yar oo Kalawda la yidhaahdo dugsigeed, oo annagoo aad u dhibtoonay ayaan waxaan awood u helnay inaan huurigii aad u xidhno; ¹⁷Oo kolkii ay kor u soo bixiyeen ayay waxay ku isticmaaleen xadhko wax tara oo doonnidiina way adkeeyeen, oo iyagoo ka cabsanaya inay Surtis oo bacaad ah ku dhacaan, ayay waxay dejiyeen shiraaqii, oo sidaasaa loo kaxaystay. ¹⁸Oo sidii annu duufaankii aad ugu hawshoonaynay, ayay maalintii dambe shixnaddii badda ku tuureen. ¹⁹Oo maalintii saddexaadna waxay gacmahoodii ku tuureen alaabtii doonnida. ²⁰Oo markii intii maalmo badan ah ayan qorraxdii iyo xiddigihii toona ifin, oo duufaan aan yaraynuna uu nagu dhacayay, ayaa rajadii aamlu badbaado ku rajaynaynay oo dhan nalaga qaaday.

27:14

NASB, NRSV “duufaan weyn”
NKJV “dabayl xooggan”
TEV “duufaan aad u xooggan”
NJB “duufaan”

Ereygan Giriigga ahi waa *tuphon* (typhoon) + *ikos* (lamida). Waxa ay ahayd dabayl kedis ah oo oo xooggan. Waxa ay kasoo kicitintay buuraha dhererkoodu yahay 7,000 ee ku yaalla Kirite.

▣

NASB “Yurokludoon”
NKJV “Yurokludoon”
NRSV, TEV “woqooyi bari”
NJB “woqooyi bariga”

Waxa weeyi magac gaar ah oo la siiyay dabaysha xilligan oo kale sanadka soo dhacda. Waxa ay ka koobantahay (1) ereyga Giriigga ah , “dabaylbari” (*euros*) iyo (2) erey Laatiin ah “dabaylwoqooyi” (*aquilo*). Waxay ahayd dabayl si kedeis ah usoo dhabatay oo woqooyibari ka timaadda.

Sababtan aawadeed ayaa waxay ku noqotay erey caadi ah (*eukakulōn*), waxaana si qaldan u fahmay culimadii danbe iyagoo isku dayay inay siyaabo badan u fiiyaan si macnuhu u saxsanadao.

27:15 “wejiga siin kari weyday dabaysha” Dooniyihii wakhtiyadii hore waxa dhinacyada lagaga sawiri jiray qaanso. Kaddibna waxa bedelay sawiro dad iyo xayawaan oo lagu bedelay meeshii qaansada (cf. 28:11). Xitaa maanta waxa aan doonyaha ku magacawnaa magaca dheddig ah. weedhani macnaha caadiga ah waxa weeyi “kasoo horjeeda” (*anti*) loo geeyay “il” (*ophthalmos*). Doonnida umay jeedin karaynin xagga dabaysha.

27:16 “Kalawda” Jasiiraddan yari waxay ay ku dhowaad konton mayl dhinaca koonfureed ka xigtaa xeebta kirite. Hadda waxa ay ahaayeen kuwo aan waxba samayn karin si a u waajahaan dabaysha bari ee xooggan. Waxa ay ka faa’idaysteen meel ay dabaysha kaga dhuuntaan si ay u sameeyaan waxa ay samayn karaan.

Qoraal gacmeedyada Giriigga ayaa waxa ay ku kala duwanyihiin magacaabista jasiiraddan.

1. *Kauda*, MSS P⁷⁴, κ², B
2. *Klauda*, MSS κ*, A
3. *Klaudēn*, MSS H, L, P, iyo kuwo badan oo ka mida qoraal gacmeedyadii danbe
4. *Gaudēn*, qoraalka Giriigga ah waxa isticmaalay by Jerome
5. *Klaudion*, kuwo ka mida qoraal gacmeedyada kale

UBS³ iyo UBS⁴ wuxuu ku siinayaa #1 “B” (hubaal). Labada ikhtiyaar ee ugu horreeyaa waxa ay noqon karaan qaabka magaca Giriigga iyo Laatiinka.

▣ **“inaan huurigii aad u xidhno”** Waxa weeyi dooni yar oo xeebta taalla (cf. aayadaha. 30, 32). Doonidan waxa aad u adkayd in ay kaantarooшо markab wayn.

27:17 “isticmaaleen xadhko wax tara oo doonnidiina way adkeeyeen” Waxa ay tilmaamaysaa xadho khaas ah oo lagu maamulo looguna tala galay dabaysha ama duufaanka (cf. Aristotle, *Rhetoric* 2.5.18).

▣ **“Surtis oo bacaad ah”** Waxa ay ahaayeen bacaad ka yimaadda xeebaha Afrika. Waxa lagu magacaabi jiray Surtiska Wayn iyo Surtiska Yar (cf. Pliny, *Nat. Hist.* 5.4,27). Waxa ay ahayd meesha ay doomo badani ku iilan jireen. si la isaga ilaaliyo Surtiska Wayna waxa ay doonyuhu u leexan jireen dhinaca koonfureed.

▣ **“dejiyeen shiraaqii”** Sida ugu wanaagsan ee loo fasiri karaa waa “hoos loodhigay.” Maxay hoos udhigeen: (1) shiraaqadii mise (2) qayb ka mida shiraaqa? Ujeedadu waxay ahayd in doonta la dejiyo, laakiinse waxa ay heleen inay xoogaa maamulaan.

Shiraaqdu may ahayn kuwo doonta hoos u dhigaya, laakiin waxa weeyi kuwo yaraynaya culayska isla markaasna hoos u dhigaya doonta si aanay ugu soconin xagga koonfurta (cf. qoraallada gaboobay ee Laatiinka iyo NASB, NRSV, iyo NJB).

Waxa jira tarjumaado Ingiriisi ah oo middan u tarjuma “dejinta shiraaqa” (cf. NKJV, TEV, NJB, iyo Peshitta). Kelmadda Giriigga ahi waxa ay la macno tahay “wax” (cf. Louw & Nida, *Greek-English Lexicon*, vol. 2, p. 223) waana in lagu tarjumo iftiiminta macnaha gaarka ah. waxa jira qoraallo gaara oo baybri ah una isticmaalay shiraaqa (cf. Moulton & Milligan, *The Vocabulary of the Greek Testament*, p. 577). Haddii ay sidaas tahay, waxa ay dejiyeen qayb ka mida shiraaqa oo dhammaantood may wada dejinin. Waxa ay isku dayeen inay maamulaan oo sida ugu suurto galsan ay hoos ugu dhigaan.

27:18-19 Tani waxa ay muujinaysaa sida ay dabayshan ama duufaankani uu u xoogganaa ee khatartana uu u ahaa (cf. 20).

27:18 “shixnaddii badda ku tuureen” Tani waxa ay tusinaysaa in iyagu ay si runa ugu cabsadeen noloshooda.

27:19 “alaabtii doonnida” Waxa middan loogala jeedo lama garanayo, waxa suuro gala inay tahay doonnida iyo xamuulkii saarnaa. Waxa ay yeelan kartaa macnoyaal dhowr ah. waxa ay aad uula mid tahay shiraaqa ama qayb ka mida shiraaqyada, sida ku sugan aayadda 17.

27:20 “Oo markii intii maalmo badan ah ayan qorraxdii iyo xiddigihii toona ifin” Weedhani waxa ay tilmaamaysaa in aanay garanin meesha ay ku suganyihiin. Waxa ay ka cabsanayeen xeebta woqooyiga Afrika, laakiin may sheegi karin inta ay u jiraan (cf. aayadda. 29). Haddii aanay jirin xiddigaha iyo cadceeddu may aanay garin karin goobta ay ku sugan yihiin.

▣ **“ayaa rajadii aanu badbaado ku rajaynaynay oo dhan nalaga qaaday”** Tani waxa ay dejinaysay heerka rajada Bawlos ee dhiirranaantiisa ee ku salaysan riyadiisii hore (cf. aayadaha. 21-26). Ilohoodiina waa ay tegeen!

NASB (UPDATED) TEXT: 27:21-26

²¹Oo kolkii ay wakhti dheer cunto la aan sii joogeen ayaa Bawlos dhexdooda istaagay. oo wuxuu ku yidhi, Niman yahow, waxaa idinku habboonayd inaad i maqashaan oo aydaan Kereetee ka soo dhoofin oo helin waxyeelladan iyo khasaarada toona. ²²Haddaba waxaan idinku waaninayaa inaad kalsoo naataan: waayo, midkiinna nafta waayi maayo, laakiin waxaa keliyahoo dumaya doonnida. ²³Waayo, xalayto ayaa waxaa i soo ag istaagtay malaa'igtii Ilaaha i leh oo aan weliba u adeego. ²⁴Waxay igu tidhi, Bawlosow, ha cabsan: waayo. waa inaad Kaysar hortiiisa istaagtaa: oo weliba bal eeg, Ilaah wuxuu adiga ku wada siiyey kuwa kula socda oo dhan. ²⁵Haddaba. niman yahow, kalsoonaada, waayo, anigu Ilaah waan rumaysanahay inay noqon doonto sidii la ii sheegay. ²⁶Habase yeeshee waa inaynu ku dhacno gasiirad.

27:21 “Oo kolkii ay wakhti dheer cunto la aan sii joogeen” Ugu yaraan waxa jira saddex macne oo suurto gal ah lana xidhiidha aayadda 33:

1. waxa laga yaabaa in ay xanuun ka qaadeen badda iyo duufaank
2. waa ay soomayeen oo tukanayeen si ay u badbaadaan (i.e., waxyaalo dadka jaahiliintu akhriyaan, cf. aayadda. 29)
3. waxay ku mashquulsanaayeen badbaadinta doonta, iyadoo cuntada muhiimaddeedii yaraatay

▣ **“waxaa idinku habboonayd inaad i maqashaan”** Bawlos ayaa odhanaya “waxaa haboonayd inaad I maqashaan!” Waxa ay siinaysay Bawlos in uu yahay afhayeenka Ruuxa.

27:22 “laakiin waxaa keliyahoo dumaya doonnida” Fiiro u yeelo isticmaalitaanka *dei* aayadda. 26. Ka eeg sharraxa buuxa ee *dei* 1:16. Saddex jeer ayaa lagu adeegsaday cutubikan dhexdiisa (aayadaha . 21,24,26).

27:23 “malaa'igtii Ilaaha” Marar badan ayaa Ciise ama malag uu u muuqday Bawlos si uu u dhiirri geliyo (cf. 18:9-10; 22:17-19; 23:11; 27:23-24). Ilaah waxa uu nolosha Bawlos ka lahaa qorshe iyo ujeedo wacdin ah (cf. aayadda. 26; 9:15) duufaankuna muu istaajin doonin isaga.

27:24 “Bawlosow, ha cabsan” Waa fal wakhti xaadirka jooga oo aan dhammaystirnayn waxaana la socota wax u diiditaan, taasi oo caadi ahaan ka dhigan joojinta fal hore loo samaynayay (cf. Fal 23:11; Maahmaahyadii. 3:5-6).

▣ **“Ilaah wuxuu adiga ku wada siiyey kuwa kula socda oo dhan”** Falka hore waxa weeyi mid dhammaystiran oo wax tusmaynaya. Ilaah waxa uu qorshe ka lahaa adeegga Bawlos (cf. 9:15; 19:21; 23:11). Waa inuu (*dei*) Rooma dhexdeeda uuga hor marag furo hoggaamiyayaasha xukuumadda iyo askarta. Nolosha Bawlos iyo iimaankiisuna waxa uu saameeyay kuwii isaga la socday. Ballaadhinta nimcadan oo kale waxa laga arki karaa Sharciga Kunoqoshadiisa. 5:10; 7:9; I Korintos.7:14. Tani meesha kama saarayso masuuliyadda shakhsi ahaaneed, laakiinse waxa ay xoogaynaysaa saamaynta qoyska rumaysadka leh, saaxiibada, iyo cidda ay wada shaqeeyaan.

27:25 Digniinta Bawlos ee aayadda. 22, “kalsoonaada,” waa fal wakhti xaadirka jooga oo aan dhammaad lahayn, oo soo noqnoqonaya, “kalsoonidiinna ku socda,” taasi oo ah fal wakhti xaadirka jooga amarna ah.

▣ **“waayo, anigu Ilaah waan rumaysanahay”** Bawlos la kulmitaankiisii Masiixa nooli, waxa uu u suurto geliyay inuu isku halleeyo ereyga Ilaah (“inay noqon doonto sidii la ii sheegay” fal dhammaystiran oo mafcuulku soo horreeyo waxna tusinaya. Iimanaku waa gacanta aqbalaysa hadiyadaha Ilaah, mana aha badbaadada oo keliya, balse kalsoonaan.

Robert B. Girdlestone, *Synonyms of the Old Testament* ayaa dhigaya hadal wayn isaga oo kasoo xiganaya Romaine, *Life of Faith*.

“Hadda waxa aan Axdiga Cusub ugula dhowaanaynaa inaga oo si cad u kala saarayna iimaanka gacanta ku jira, iyo isku hallaynta iyo rajada midka kale. iimaanku waxa weeyi Ilaah oo lagu qaato eraygiisa, halka isku hallaynta iyo samirka iyo sidoo kale rajadu ay ka yihiin midhaha iimaanka ee muujinaysa kalsoonida uu qofku dareemayo. Farriintu waxa ay ka imanaysaa ka keenay jiritaankayga; waxa aanay noqon kartaa, hadidaad,

ballanqaad, ama amar. Haddii aan ku qaato ‘haa iyo run,’ kaasi waa iimaanka; camalka ka imanayaana waxa weeyi camalka runsheegnimada Ilaah. iimaanku marka loo eego Qorniinka, waxay u muuqataa inuu toosinayo hadal, fariin, ama muujin. Haddaba, Romaine ka waxbartay waxa uu kitaabkiisa *Life of Faith* ku leeyahay: ‘Iimaanku waxa weeyi rumaysashada runta Ereyga Ilaah; waxa uu la xidhiidhaa ereyo lagu hadlo ama ballan qaadyo uu isagu sameeyay, waxaanay soo bandhigaysaa rumayska qofka maqlayaa uu ku run ugu qaadanayo, isla markaasna uu ku dhaqmayo, waana kan iimaanku.’ Midhihiisu waxa ay ka muuqanayaa dabiicadda farrinta uu aqbalay, iyo marka loo eego dhacdooyinka ku hareeraysan qofka aqbalaha ah. Waxa uu Nuux ku hoggaamiyay in uu dhisto dooni, Ibraahimna inuu sugu wiil u dhalan doona, Muusana in uu diido in loogu yeedho wiilkii ay dhashay gabadha Fircoon, Israa’iiliyiintuna in ay ku wareegaan gidaarrada Yerixoo. Waxa aan rumaysanahay Ilaah in ay noqon doonto sida la iisheegay, kanina waa sawirka waxa uu Kitaabku ugu yeedhayo iimaan” (pp. 104-105).

Wax ku saabsan “rumays” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 2:40; 3:16; iyo 6:5.

NASB (UPDATED) TEXT: 27:27-32

²⁷laakiin intii badda Adriya hore iyo gadaal nalagu kaxeeyey. kolkii habeenkii afar iyo tobnaad la gaadhay, goor habeenbadhkii ku dhow, ayaa baxriyiinta waxay u maleeyeen inay dhul ku soo dhowaanayeen; ²⁸kolkaasay moolkii badda qiyaas ka qaadeen, oo waxay heleen inuu yahay labaatan baac, oo haddana kolkay in Yar socdeen ayay mar kale qiyaas qaadeen, oo waxay heleen inuu yahay shan iyo toban baac. ²⁹Waxay ka cabsadeen inaannu ku dhacno meelo dhagaxyo leh, markaasay waxay doonnida xaggeeda dambe ka tuureen afar barroosin. oo waxay aad u jeclaysteen in maalin noqoto. ³⁰Oo baxriyiintii ayaa waxay damceen inay doonnida ka baxsadaan, oo waxay badda qarsoodi ugu dejiyeen huurigii sidii iyagoo barroosinno ka tuuraya doonnidii xaggeeda hore. ³¹Markaasaa Bawlos boqol-utaliyihii iyo askartii ku yidhi, Kuwanu haddayan doonnida sii joogin. idinku badbaadi kari maysaan ³²Markaasaa askartii xadhkaha huuriga ka jareen oo ay huurigii sii daayeen inuu dhaco.

27:27 “habeenkii afar iyo tobnaad” Wakhtigani waxa uu yahay mid ku haboon masaafadii ay soo socdeen (i.e.,badda kusoo jireen). waxa ay socdaaleen 476 mayl oo ka dhigan 36 mayl 24 saacaadoodba inay soconayeen.

▣ **“badda Adriya”** Waxa ay tilmaamaysaa koonfurta dhexe ee Midhatareeniyanka (Adriya). Ma tilmaamayso badda Adriyaatiga ee maanta jirta.

▣ **“ayaa baxriyiinta waxay u maleeyeen inay dhul ku soo dhowaanayeen”** Waxa suurto gal ah in ay maqleen mawjadaha ama shimbiro ama kalluun gaar ah.

27:28 “moolkii” Tani waxa ay ka ahaatay falka macnihiisu yahay “tuuridda xadhkaha,” taasi oo ka dhigan tuuritaanka xadhkaha calaamadinaya inta biyaha jooggoodu jiro.

▣ **“baac”** Waxa uu ahaa inta u dhaxaysa baabacada iyo suxulka. Waxa ay uu tusinayaa qiyaastay ay badmaaxyadu u adeegsan jireen inta uu jiro joogga biyuhu.

27:29 Waxa ay ahayd mugdi ilaa hadda, manay garanaynin meesha ay joogaan. Waxa ay rabeen in ay istaajiyaan doonta iyo in ay gaadho dhulka ilaa ina ay ka arkayaan meesha ay doontu u jeeddo.

27:30 Badmaaxyadani may ahayn niman iimaan leh, laakiin waxa ay samayn dooneen waxkasta oo nafhooda badbaadin kara.

27:31 Waxa jiray xaalado (jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah) soo cusboonaaday oo la xidhiidhay muujinta Bawlos iyo ballan qaadka Ilaah.

▣ **“badbaadi”** Waxa ay Axdiga Hore ku tusinaysaa macno ah badbaado jidh ahaaneed (cf. Yacquub 5:15). Iyagoo garanaya Bawlos, badmaaxyadan, askartan, iyo rakaabka la socdaa waxa ay maqleen injiilka, kaasi oo keenaya badbaadada Axdiga Cusub ee ah ruuxiga. Waxa weeuo arrin lagu murugoodo in dhimasho jidh ahaaneed laga badbaado oo aan laga badbaadin dhimashada weligeed ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 27:33-38

³³Oo intii waagu soo beryayay, ayaa Bawlos wuxuu dadkii oo dhan ka baryay inay wax cunaan, oo wuxuu yidhi, Maanta waa maalintii afar iyo tobnaad intii aad sugayseen oo aad iska soomanaydeen. oo aydnaan waxba qaadan. ³⁴Haddaba waxaan idinka baryayaa inaad cunto qaadataan. waayo. taasuu waa caafimaadkihiis aawadiis: maxaa yeelay. midkiinna tin keliyahu ka go'i maayo madaxiisa. ³⁵Oo markii uu saas yidhi. ayuu w uxuu soo qaatay kibis. oo dadkii oo dhan hortooda ayuu Ilaah ugu mahad naqay, oo intuu kala jebiyey ayuu bilaabay inuu wax cuno. ³⁶Markaasay wada dhiiranaadeen dhammaantood. oo iyagiina wax bay cuneell. ³⁷Oo intayadii doonnidii ku jirtay oo dhammu waxaannu ahayn laba boqol iyo lix iyo toddobaatan qof. ³⁸Oo markii ay cuntada ka dhergeen, ayay doonnidii fududeeyeen, oo sarreenkiina waxay ku tuureen badda.

27:34 “midkiinna tin keliyahu ka go'i maayo madaxiisa” Bawlos waxa uu isticmaalayaa erayo la mid ah kuwii Ciise (cf. Luukos 12:7; 21:18). Tani waxay ahayd weedh Cibraani ah oo loo adeegsado ilaalinta (cf. I Samuu'eel. 14:45; II Samuu'eel. 14:11; I Boqorradii. 1:52).

27:35 Tani ma tilmaamayso Cashada Rabbiga, laakiin waxa ay tusinaysaa iimaanka Bawlos xitaa iyadoo lagu dhex jiro dhibaatooyin. Iimaanka Bawlosna waxa uu saameeyay kuwa kale (cf. aayadda. 36).

27:37 “laba boqol iyo lix iyo toddobaatan qof” Waxa ay koobsanaysaa dadkii shaqaalaha ahaa iyo rakaabkii.

1. qoraal gacmeedka B (qarnigii afraad) waxa uu dhigayaa “76”
2. MSS x (qarnigii afraad) iyo C (qarnigii shanaad) waxa uu dhigayaa “276”
3. qoraal gacmeedka A (qarnigii shanaad) waxa uu dhigayaa “275”
4. Dhammaanba tarjumaadaha casriga ahi waxay dhigayaan 276 UBS⁴ waxa uu ku bixinayaa “B” (hubaal).

27:38 Waxa ay ahayd dooni xamuul oo wayn lagana leeyahay Masar. Waxaanay horeba isaga soo rogeen shixnadihii kale oo dhan (cf. aayadda. 18).

NASB (UPDATED) TEXT: 27:39-44

³⁹Oo markii waagii beryay, ayay dhulkii garan waayeen: laakiin waxay arkeen marso xeeb leh. oo waxay doonayeen inay doonnidii halkaas ku kaxeeyaan hadday karaan. ⁴⁰Markaasay barroosimladii badda ku xooreen oo badda ku sii daayeen, oo isla markaasba waxay fureen xadhkihiis shukaanaha ku xidhnaa, oo intay shiraaqii dabaysha u sii daayeen, ayay xeebta ku hagaageen. ⁴¹laakiin waxay ku dhaceen meel laba badood isaga darmadaan. markaasaa doonnidii dhulka ku dhufatay; oo dhankeedii hore ayaa meel ku liimbaaday oo waxay noqotay wax aan la dhaqdhaqaaqin karin. Laakiin dhankii dambe wuxuu bilaabay inuu ku burburo mawjadihii xoogooda. ⁴²Markaasaa askartii waxay ku taliyeen inay maxaabiista laayaan, si aan midkoodna intuu dabbaasho uga baxsan. ⁴³laakiin boqol-u-taliyihii oo doonayay inuu badbaadiyo Bawlos, ayaa qasdigoodii ka joojiyey: oo wuxuu amray in kuwa dabaalan karaa ay doonnida iska tuuraan. oo ay marka hore dhulka tagaan: ⁴⁴oo inta kalena qaar ha ku dabaasho looxaan, qaarna waxyaalo kale oo ay doonnida ka sii qaataan. Oo sidaas daraaddeed waxay noqotay inay dhammaantood dhulkii u baxsadeen iyagoo nabdoon.

27:39 Ilaah hadda waxay awoodi kareen inay xoogaa darajo maamulaan doonta (cf. v. 40).

Waxa jira kala duwanaansho qoraal gacmeedyada Giriigga ah oo la xidhiidha “intayadii doonnidii ku jirtay” (cf. MSS a, A, B²) iyo “doonnida nabad kagasoo degay” (cf. MSS x* iyo C). labadan kelmadood aad ayay isugu eegyihiin (*exōsai* vs. *eksōsai*). Qoraal gacmeedyadii hore badanaa waxa laga akhriyay hal meel kuwo badanina way maynguuriyeen. Ereyada isku dhodhowna badanaa waa lagu wareerayay.

27:40 Waxa ay sheegaysaa xeebta ku samaysantay duufaan badan. Xaaladdan iyada ahna waxa sababay mawjado meel ku wada kulma.



NASB, NKJV,
NJV “shukaanaha”
NRSV, TEV “xakameeyayaasha shukaanta”

ani waxa ay tilmaamaysaa labada shukaamood oo ku oolli jiray doomaha waawayn. Yacquub 3:4 ayaa eraygan oo kale u isticmaalaya “shukaan.”

▣ **“shiraaqii”** Waa kelmad dhif ah, laakiinse waxa ay tilmaamaysaa shiraaq yar oo ku xidhan huudhi (cf. Juvenal, *Sat.* 12.69).

27:42 “askartii waxay ku taliyeen inay maxaabiista laayaan” Haddii ay baxsadaan askarta waxay qaadi lahaayeen masuuliyadda arrintaas.

27:43 ereyada Bawlos, iimaankiisa iyo ficilladiisu waxa ay taliyihii Roomaanka ahaa ku qanciyeen inuu isaga ku kalsoonaado oo uu ilaaliyo.

SU’AALO FALQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraaga waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Diiwaan gelinta Luukos ee ku saabsan Bawlos oo u dhoofay Rooma waxa ay koobsanaysaa ereyo la xidhiidha qalabka. Maxay haddaba waxyaalahani tusinayaan?
2. Maxay aayadda. 20 ay fiqi ahaan muhiim u tahay?

FALIMAHA RASUULLADA 28

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bawlos oo Xeebta Malita Jooga 28:1-10	Bawlos Adeeggiisii ku aaddanaa Malita 28:1-10	Bawlos oo Malita Joobga 28:1-6	Malita dhexdeeda 28:1-6	Kju-sugiddii mMalita 28:1-6
Bawlos oo Rooma imanaya 28:11-15	Imaanshadii Rooma 28:11-16	28:7-10 Usoo Safriddii Rooma 28:11-15	28:7-10 Ka Malita Ku Rooma 28:11-15	28:7-10 28:11-14 28:15-16
28:16	28:16	28:16	Rooma dhexdeeda 28:16	
Bawlos oo Rooma Wax Ku wacdinaya 28:17-22	Bawlos Adeeggiisii Rooma Dhexdeeda 28:17-31	Bawlos iyo Yuhuuddii Rooma 28:17-22	28:17-20 28:21-22	Bawlo oo La Xidhiidhaya Yuhuuddii Rooma 28:17-20 28:21-22
28:23-29		28:23-29	28:23-27 28:28 28:29	Bawlos Wax-u-bandhigiddiisii Yuhuudda 28:23-27 (26-27) 28:28
28:30-31	28:30-31	28:30-31	Gabaggabo 28:30-31	Soo Af Jarid 28:30-31

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

WORD AND PHRASE STUDY

NASB (UPDATED) TEXT: 28:1-6

¹Oo kolkii aannu wada baxsannay ayaan ogaannay in gasiiraddaas la yidhaahdo Melita. ²Oo barbariyiintii waxay na tuseen raxmad khaas ah; waayo, iyagu waxay shideen dab, oo dhammaantayona way na soo dhoweeyeen, sababtuna waa roobkii wakhtigaas jiray daraaddiis iyo dhaxantii daraaddeed. ³laakiin Bawlos ayaa soo ururshay xaabo badan. oo wuxuu saaray dabka. kolkaasaa kulaylka daraaddiis waxaa soo baxay jilbis oo gacantiisuu ku dhegay. ⁴Oo barbariyiintiina markay arkeen bahalkii gacantiisa ka laalaaday ayaa midkoodba wuxuu mid kale ku yidhi, Shaki la aan ninkanu waa nin dhiig qaba, waayo, in kastoo uu baddii nabdoonaan kaga baxsaday, haddana xaqnimadu uma oggolaan inuu sii noolaado. ⁵Habase yeeshee bahalkii ayuu dabka iskaga tuuray, oo innaba waxyeello ma gaadhin isagii. ⁶laakiin iyagii waxay filanayeen inuu haddiiba bararo ama uu markiiba dhaco isagoo meyd ah: laakiin kolkii ay wakhti dheer dhawrayeen oo ay arkeen inaan waxyeello ku dhicin isagii, ayay fikirradoodii beddeleen, oo waxay isku yidhaahdeen, Isagu waa ilaah.

28:1 “Oo kolkii aannu wada baxsannay” Tani waa weedha *sōzō* (cf. 27:31) oo lagu daray hor-galaha *dia*. Waxa uu ka hadlayaa qof si nabad ah ku soo gaadha (cf. 23:24; 27:44; 28:1,4). Luukos wuxuu xitaa u adeegsanayaa bogsiinyo jidh ahaaneed sida ku jirta Luukos 7:3.

Qaybta Falka Tegay ah waxa ay muujinaysaa in Luukos waxa uu u danaynayey in badbaadinta laga helo Ilaah (Fal Maldahan) Marka Ereygiisa la tix-raaco (cf. 27:21-26).

▣ **“Melita”** Diiniwadihii Fiyoonika ayaa sidoo kale jasiiraddan ugu yeeray Melita, kaasoo ahaa mid reer Kancan ka yimid oo macnihiisu yahay “refuge” ama “qaxooti.” Tani asal waa wax-addoonsadayaashii reer Fiyoonika. Waxa ay u dhexaysay Sicily iyo Waqooyiga Afrika. Waa siddeed mayl oo dherer ah iyo siddeed mayl oo ballaca ah, laakiin waxa ay ahayd mid xagga badda ganacsi ahaan qiimo ku leh. Oo xagga nabadda qaxootiga dhawr qaab ugu wanaagsan.

28:2 “barbariyiintii” Tani macnaheedu waa “barbarians” “kuwa dhaladka ah.” Tani ma aysan ahayn magic wax looga soo hor jeedo, laakiin waxa uun ay la xidhiidhaa mid kasta oo aan Giriig iyo Laatiin midna ku hadlin.

▣

NASB
NKJV, NRSV,
NJB
TEV

“naxariis caadiga ka fog”

“naxariis aan caadi ahayn”

“aad u saaxiibtinimo wanaagsan”

Weedhan xoogga badan ee *philanthrōpos*, oo macnaheedu waa “jeclaanshada aadanaha” sida ku jirta 27:3. Daryeelka qaaska ah iyo adeegga la siiyay kuwa dhaladka ah (barbariyiinta), waxaay ahayd maaddaama ay arkeen bawlos hawshiisii mucjisada lahaa ee maskii xeebta agteeda.. Middan, iyo mucjisoooyin kale oo ku jira (cf. aayadaha. 7-10), ayaa adeegga wax wacdinta albaabka u furtay! Bawlos wuxuu sidoo kale maan u lahaa shaacinta injiilka (cf. I Korintos. 9:19-23).

28:3 “Bawlos ayaa soo ururshay xaabo badan” Tani waxa ay runtii muujinaysaa Bawlos qiimayntiisa dadka. Kuwii kale oo dhan ayuu u shaqeeyay. Ma jirin wax diin kale ah laga soo bilaabo illaa lagu yimaado jidka Dimishiq!

☐ **“soo baxay jilbis oo gacantiisuu ku dhegay”** Weedhan nacnaheeda aasaasiga ahi waa “wax ku soo weeraray.” Waxa ay noqon kartaa “qaniinyo” ama “isku duuduubay.”

28:4 “bahalkii” Nreygan u taagan “bahalkii” waxa ay noqotahy weedhii dawada u noqontay masaskii suntan lahaa (cf. 10:12).

☐ **“haddana xaqnimadu uma oggolaan inuu sii noolaado”** Ereygan “xaqnimada” or “qadar” ayaa waxa uu ahaa mid ka mid ah ilaahyadooda. Waxa ay muujinaysaa sida ay arrintu layaabka u leedahay, si la mid sida tii Caamoos 5:19. Aayaddan 6-aad waxa ay muujinaysaa in reer xeebeedka dhaladka ah ay ilaahyo dhowr ah caabudayeen.

28:6 Reer xeebeedyadahni waxay waayo-aragnimo shaqsi ahaaneed u lahaayeen masaka jasiiradda joogay. Fikirka isbeddelkooda asalraacnimo ayaa waxa uu la mid yahay ficilladii ka soo baxay kuwii sanamyada caabudayay taasoo ay sabab u tahay mucjisada ku jirta Falimaha Rasuullada Acts 14:11-13.

☐ **“inuu haddiiba bararo”** Tani waxa ay ka mid tahay ereyadii xagga dawaynta ee Luukos adeegsaday sida ku jirta (cf. aayadda. 8).halkan oo qudha ayaa lavga helayaa Axdiga Cusub dhexdiisa.

NASB (UPDATED) TEXT: 28:7-10

⁷Haddaba meeshaas waxaa u dhowaa dhulal uu leeyahay ninkii gasiiradda madaxda u ahaa oo magiciisa la odhan jiray Bobliyos. Kaasuna waa na soo dhoweeyey. oo intii saddex maalmood ah ayuu si sharaf ah noo marti qaaday. ⁸Oo waxay noqotay in Bobliyos aabbihiis jiifsaday isagoo qandho iyo dabadhiig qaba. Markaasaa Bawlos isagii u galay oo intuu u duceeyey ayuu gacmihiisii saaray oo wuu bogsiiyey isagii. ⁹Oo markii waxaas la sameeyey dabadeed ayaa intii kale oo cudurro qabtay oo gasiiraddii joogtay oo dhammu wada yimaadeen. oo iyana waa la bogsiiyey; ¹⁰oo kuwaasuna waxay nagu sharfeen sharaf badan; oo markii aannu dhoofaynay ayay doonnida noo saareen wax alla wixii aannu u baahnayn.

28:7 “ninkii gasiiradda madaxda u ahaa” Ereygan macnihiisu wuxuu tilmaamayaa sarkaal sare oo dawladda ka mid ah kaasoo si gaar ah u tilmaamaya inuu yahay “kan koowaad” (cf. 13:50; Luukos 19:47, “ee dadka”; 16:12, “iyo magaalada”). Xeebtan labo qoraal ayaa lagu arkay, mid Giriig ah iyo mid laatiin ah. Rooma ayaa jasiiraddan u oggolaatay isxukun gaar ah, si ahaanse waxa ay ahaayeen Rooman xagga waddaniyadda.

28:8 “jiifsaday isagoo qandho iyo dabadhiig qaba” Malita qandhadan waa lagu yiqiin waxayna ka timid noolaha ilma-aragtada ah ee ku jira caanaha riyahooda.

☐ **“gacmihiisii saaray oo wuu bogsiiyey isagii”** Ka eeg Mawduuc Gaar ah: gacmo Saarid 6:6.

28:9 labadan erey ee falsameeyaha ahi waa fal tegay oo socday, oo tilmaamaya fal soo noqnoqday ama soconayey (INDICATIVE MOOD). Waxay sii wadeen inay u yimaadaan. Ilaahna wuxu sii waday inuu bogsiiyo iyaga Isaga oo Bawlos u soo marinaya. Ereyga Falsameeyaha ee Giriigga ah *therapeuō*, waa tan uu ka yimid ereyga Ingiriisiga ah ee “therapy.” Ereyga waxaa loo isticmaali karaa “adeeg” si la mid abh sida “bogsiiinta oo kale.” Macnaha guud ee meesha ku jira uun baa qaadan kara midda la dorr bidayo.

NASB (UPDATED) TEXT: 28:11-15

¹¹Saddex bilood dabadeed waxaannu ku dhoofnay doonni Iskanderiya ka timid oo wakhtigii qabowga gasiiraddii joogtay taasoo sumaddeedii ahayd Walaalihii Mataanaha ahaa. ¹²Markaasaannu nimid Surakus. oo saddex maalmood ayaan halkaas sii joognay. ¹³Oo halkaasaannu ka wareegnay oo waxaannu gaadhnay Regiyon; oo maalin dabadeed waxaa kacday dabayl koonfureed, oo maalintii labaadna waxaannu nimid Botiyolos. ¹⁴Oo halkaas waxaan ka helnay walaalo, oo waxay naga baryeen inaan toddoba maalmood iyaga la sii joogno. oo sidaas ayaan Rooma ku nimid. ¹⁵Oo halkaasna walaalihii markii ay maqleen warkayagii, ayay u soo baxeen inay naga hor yimaadaan, oo waxay soo gaadheen tan iyo Suuqa Abbiyus iyo Saddexdii Makhaayadood. Oo Bawlosna markuu arkay iyagii ayuu Ilaah ku mahad naqay oo sii dhiirranaaday.

28:11 “doonni Iskanderiya ka timid” Tani waxa ay dabcan ahayn doonni kale oo weyn oo ku socotay Qallooca magaalada dekadda ah Naabuli taasoo Masar ka timid (cf. 27:6,38).

▣ **“oo wakhtigii qabowga gasiiraddii joogtay”** Badda Midhatareeniyanka waxa ay ahayd mid aad u duufaano badan bilaha jiilaalka oo ay adag tahay in doonni lagu wado. Qadaka doonyaha waxaa dib loo furayay goor dambe oo Feebaraayo iyo Maajo ah.

▣ **“taasoo sumaddeedii ahayd Walaalihii Mataanaha ahaa”** tani waxa ay tilmaamaysaa Zeus labadiisii wiil ee mantaanaha ahaa, Caster iyo Pollox. Waxa ay ahaayeen kuwa Roomanka Sanamyada caabudayey wakiillada uga ah xagga doomaha. Sanamkii badda ee lagu magacaabi jiray Poseidon ayaa wuxuu iyaga siiyey awood oo ka xakameeyay dabayshii, hirarkii, iyo duufaanihii. Xiddigga gaarka ah ee laxaha. Sida cad waxa ay calaamaddoodu ahayd sidii kuwo qaanso ku qallooca, oo sida oo sina calaamadda qiyaasta dadka aan jirin ah oo qaanso ku qoolaaban.

28:12 “Surakus” Tani waxa ay ahayd magaalo muhiim ah oo Sicily ka mid ah oo galbeedka xeebta ku taal. Dekaddani waxahy siddeed mayl xagga waqooyi ka xigtay Malita

28:13 “gaadhnay” Qraalladii qadiimiga ahaa! ee (Siniaticus), iyo ♂ (Vaticanus) waxa uu leeyahay “barroosin miisaan weyn,” oo xagga farsamada doomaha loo adeegsan jiray (xoogaa qaababka shaqada Luukos ah), laakiin qoraallada kale sida P74, ♂^c, iyo A waxa uu leeyahay “way gudbeen,” sida 16:8.

▣ **“Regiyon”** Tani waa magaalada koonfur galbeed ee Talyaaniga.

▣ **“Botiyolos”** Tani waxa ay xarunta dhoofinta galleeyda ee Rooma oo ku taal Bay-da Naabuli. 180 mayl ayey ku labo maalmood ka gudbeen.

28:14 “Halkaas waxaan ka helnay walaalo” Iskju-imaad Masiixiyiin ah ayey Talyaaniga dhexdiisa (cf. aayadda. 15) iyo Rooma oo Bawlos soo dhawaysay.

28:15 “Suuqa Abbiyus” halki waxa ay ahayd meeshii uu ku soo gabagaboobay safarkii ka yimid koonfurta Talyaaniga oo ka soo bilowdariiqlii weynaa ee badda ee lagu magacaabi jiray Appian Way. Afartan iyo saddex mayl ayuu u jiraa Rooma.

▣ “Saddexdii Makhaayadood” Tani waa meesha ugu sarreysa ugu weyn oo saddex iyo soddon mayl u jirta Rooma.

▣ “Bawlosna. . . sii dhiiranaaday” Waxaa meesha ka cad in Bawlo uu mar kale niyad jabay. Waxaa macquul in tani ay saamayn ku yeelatay. Dhawr ayaa Ciise u muuqday isaga si gaar ah si uu u dhiirri geliyo.

NASB (UPDATED) TEXT: 28:16

¹⁶Oo markii aannu Rooma galnay ayaa Bawlos waxaa loo oggolaaday inuu keli ahaantiis u joogo isaga iyo askarigii dhawrayay .

28:16 “markii aannu Rooma galnay” Tani maysan ahayn waddadii uu Bawlos doonayey inuu Rooma ku yimaado. Laakiin, waxa ay ahayd waddadii uu Ilaah isugu xidhayey in Bawlos uu kula hadlo dawladda, millatariga, iyo hoggaamiyeyaashii diinta ee Rooma.

▣ “Bawlos waxaa loo oggolaaday inuu keli ahaantiis u joogo isaga iyo askarigii dhawrayay” Bawlos waxaa la geliyey xabsi guri. Marqaatiga sarkaalka keenay muusan lahayn go’aankan laakiin waa la adeegsanayay.

NASB (UPDATED) TEXT: 28:17-22

¹⁷Oo waxay noqotay in saddex maalmood dabadeed uu isugu wada yeedhay kuwii Yuhuudda ugu waaweynaa: oo kolkii ay u yimaadeen. ayuu ku yidhi iyagii, Walaalayaalow. anigu in kastoo aanan wax xumaan ah ku samayn dadkii ama caadooyinkii awowayaasheen toona, haddana anoo maxbuus ah ayaa waxaa layga soo waday Yerusaleem oo waxaa la ii gacan geliyey reer Rooma. ¹⁸Iyaguna, markii ay i imtixaameen, waxay damceen inay iska kay daayaan, maxaa yeelay, sabab dhimasho istaahisha aanay igu jirin. ¹⁹laakiin Yuhuuddu markay taas khilaafeen ayaa waxaa dirqi igu noqotay inaan Kaysar u ashtakoodo: taasuna ma ahaan inaan haystay wax aan quruuntayda ku dacwaynayo. ²⁰Sababtaas daraaddeed ayaan idiin yeedhay inaan idin arko oo aan idinla hadlo: maxaa yeelay. rajadii reer bini Israa’iil sugayaan daraaddeed ayaan silsiladda ugu xidhanahay. ²¹Oo iyana waxay isagii ku yidhaahdeen, Annagu wax warqadaa oo adiga kugu saabsan Yahuudiya kama aannu helin, oo walaalihii midkoodna xaggaas kama iman. noomana soo sheegin ama kaama soo warramin xumaato. ²²laakiin waxaannu jeclaan lahayn inaannu kaa maqalno waxaad u malaynaysid; maxaa yeelay, xagga dariiqadan waxaannu ka og nahay in meel walba ka gees ahaan lagaga hadlo.

28:17 “isugu wada yeedhay kuwii Yuhuudda ugu waaweynaa” Tani waxa ay ahayd bawlos arrintiisii rasmiga ahayd ee uu la yimid (cf. Rooma. 1:16; 2:9). Waxa uu sharraxayaa duruufihiisan haatan jira wuxuuna albaabka u furayaa soo bandhigidda injiilka.

28:18-19 Halkan waxaa mar kale dib looga arki karaa ujeedka cudurdaarka ee Luukos! Masiixiyaddu hanjabaad kuma aysan ahayn dawladda roomanka.

28:19 “Yuhuuddu markay taas khilaafeen” Weedhanni waxa ay u muuqataa mid la yaab leh oo ay ku hadleen Yuhuud Rooma jooqta. Luukos waxa uu ereygan *Ioudaios* (Yuhuud) u adeegsanayaa labo qaab.

1. dhalasho – 2:5,11; 9:22; 10:22,28; 11:19; 13:56; 14:1; 16:1,3,20; 17:1; 17:10,17; 18:2,4,5,19; 19:10,17,34; 20:21; 21:21,39; 22:3,12; 24:5,9; 24:24,27; 25:8,9,24; 20:7; 28:17
2. kuwii marqaatiga ka ahaa toddobaadkii Ciise noloshiisii ugu dambeeyay – 2:15; 10:39

Wuxuu sidoo kale u adeegsaday qiimaynno kala duwan.

1. in a negative sense – 9:23; 12:3,11; 13:45,50; 14:2,4,5,19; 17:5,13; 18:12,14,28; 19:13,14,33; 20:3,19; 21:11,27; 22:30;23:12,20,27; 24:19; 25:2,7,10,15; 26:2,21; 28:19
2. in a positive sense – 13:43; 14:1; 18:2,24; 21:20 Possibly the best text in Acts which shows the different connotations of this term is 14:1-2.

28:20 “rajadii reer bini Israa’iil sugayaan daraaddeed” Bawlos waxa uu tan ku abaarrayaa hoggaamiyayaashan Yuhuudda si uu xidhiidh uga samaysto kuwa isaga hadalladiisa maqlaya ee kor-joogtada ah. Waxa uu isku dayayaa inuu hoggaamiyayaashan Yuhuudda u helo waxyaabo ay isga waafaqsan yihiin xagga “rajada reer Bani Israa’iil.” Bawlos wuxuu tan iyaga ugu sheegayaa in Ciise ahaa Kii Iman lahaa, Masiixa ama sida macquulka ah sarekiciddii!

28:21 This lack of information about Paul is surprising in light of Paul’s ministry on three mission journeys and the events and rumors in Jerusalem.

28:22 Waa wax iska in war ku saabsan Ciise uu faafayey oo kuwo badan ay qaadanayeen injiilka. Tanse marka xagga Yuhuudda seerahooda laga eego maysan ahayn war wanaagsan! Hase ahaatee, hoggaamiyayaashan Yuhuudda ahu waxaay doonis u lahaayeen in maqlaan oo ay dhegayaan waxa uu Bawlos sheegayo..

☐ **“dariiqadan”** Ka eeg Mawduuca Goorka ah: Ciiseaha reer Naasaret 2:22.

NASB (UPDATED) TEXT: 28:23-29

²³Oo intay maalin ka ballan qaadeen, ayay hoygiisii ugu yimaadeen iyagoo tiro badan. oo isna xaalkii aad buu ugu sii caddeeyey oo u marag furay boqortooyada Ilaah, oo wuxuu iyagii ku waaninayay wax Ciise ku saabsan oo ku yaalla sharciga Muuse iyo nebiyadiiba tan iyo aroortii ilaa fiidkii. ²⁴Oo qaar baa rumaystay waxyaalihii lagu hadlay, qaar kalena way rumaysan waayeen. ²⁵Oo intay dhexdooda ka heshiin waayeen, ayay kala tageen, Bawlos se wax keliya ayuu ku hadlay, isagoo leh, Ruuxa Qoduuska ah si hagaagsan ayuu uga dhex hadlay nebi Isayos markuu awowayaashiin la hadlay, ²⁶oo ku yidhi, Adigu dadka u tag, oo waxaad ku tidhaahdaa, Maqal baad ku maqli doontaan, mana garan doontaan; Idinkoo arkaya, wax baad arki doontaan, idiinmana dhaadhici doonto; ²⁷Waayo, dadkan qalbigoodu waa qallafsanaaday, Oo dhib bay dhegahooda wax ugu maqlaan, Indhahoodana way isku qabteen; Si aanay indhaha wax ugu arkin. Oo dhegaha wax ugu maqlin, Oo qalbiga wax ugu garan, Si aanay u soo noqon, Oo aanan u bogsiiin. ²⁸Haddaba idinku waxaad ogaataan in badbaadadan Ilaah loo soo diray dadka aan Yuhuudda ahayn: oo iyaguna way maqli doonaan. ²⁹Oo markuu waxyaalahaas ku yidhi ayaa Yuhuuddii iska tageen, iyagoo isla murmaya.

28:23 “yimaadeen. . . iyagoo tiro badan. . . aroortii ilaa fiidkii” Bawlos maalintii oo dhan ayuu rumaysadka Masiixiga u sharraxayey Yuhuuddan! Maxay fursad layaab leh ahayd!.

☐ **“boqortooyada Ilaah”** Tani waxa ay ahayd tii udub dhexaadka u ahayd Ciise wacdigiisii iyo wax-bariddiisii (xagga masaallada). Waa run taagan oo ku jirta nolosha rumaystayaasha iyo mustaqbalka dambe ee Ilaah dhammaystrikiisa wanaagsan ee adduunkan dhacay (cf. Matayos. 6:10). Weedhani sida cad ma tilmaamayso reer Bani Israa’iil oo qura, laakiin waxay qayb muhiim ah u tahay rajadii reer bani Israa’iil (cf. aayadda. 20). Mawduuc Gaar ah ka eeg: 1:3.

☐ **“sharciga Muuse iyo nebiyadiiba”** Tani waa saddexda qaybood ee uu sharciga Cibraanigu u qaybsamo (Waxaad ka eegtaa Mawduuca Gaarka ah ee: 13:15 iyo sharraxa 24:14) oo u taagan Axdigii Hore idil ahaantiis (cf. Matayos. 5:17; 7:12; 22:40; Luukos 16:16; 24:44; Fal 13:15; 28:23). Paul’s barashadiisii qodobbada (Barashadiisii wax ku saabsan qoraallada ka hadlaya Masiixa iyo wax-sii-sheegidii la sii saadaaliyey) waxa ay ahayd in ay qoraallada Axdigii Hore ku keenaan Noloshii Ciisde.

28:24 Tani waxa ay la xidhiidhaa waababnka injiilka. In qaarna ay rumeeyaan qaarna ay diidaawa waa mucjisada Ilaaha qaaddirka ah iyo aadanaha doorashadooda xorta ah. Marka hal dabci laga eego Bawlos yaababkiisii ku aaddanayaa hoggaamiyayaashii Yuhuudda ahaa ee Rooma joogay waa qayb adeeggii Bawlos ka mid ah. Waxa uu mar koowaad la wadaagay Yuhuuddii Wuxuu la wadaagay sidii uu Ciise Qorniinnadii Axdigii Hore kaamilidda

ugu ahaa. Qaar way rumaysteen, laakiin badankood maysan rumaysan. Tan waxaa sidoo kale lagu sii sheegay Axdigii Hore (cf. Ishacyaah. 6:9-10).

28:25-27 “Ruuxa Qoduuska ah si hagaagsan ayuu uga dhex hadlay nebi Isayos” Tani waxa ay muujinaysaa Bawlos aragtidiisii yaabka badnayd ku wajahnayd rumaysaddarrada reer Baniis Israa’iil! Xigashada ku jirta aayadaha 26-27 waxa ay ka yimaaddeen Ishacyaah. 6:9-10. Ciise wuxuu aayaddan u adeegsaday rumaysaddarrada aadanaha (cf. Matayos. 13:14-15; Markos 4:12; Luukos 8:10; Yooxanaa 12:39-40). Waqtigan Bawlos wuxuu qalinka baalka ah kula Rooma 9-11 (Sababtee ayey reer Baniis Israa’iil u diideen Masiixa?). Israa’iishii Axdigii Hore midkoodna si buuxda uma rumaysteen. Waxaa jiray wax weli qabyo sii ahaa oo hadhsanaa xagga

MAWDUUC GAAR AH: KUWII HADHAY, SADDEX DAREEN

Ujeedka Axdigii Hore “kan rumaysadka ku jooga” waa mid ay nebiyadu ku sifoobi jireen (gaar ahaan qarnigii siddeedaad ee nebi Yeremyaah). Saddex qaab ayaa loo isticmaali jiray:

1. Kuwii masaafurinta ka soo badbaaday (tusaale ahaa. Ishacyaah 10: 20-23; 17:4-6; 37:31-32; Yeremyaah 42:15,19; 44:12,14,28; Caamoos 1:8)
2. Kawii rumaysadka ugu hadhay YHWH (tusaale ahaan. Ishacyaah 4:1-5; 11:11,16; 28:5; Yoo’eel 2:32; Caamoos 5:14-15; Miikaah 2:12-13; 4:6-7; 5:7-9; 7:18-20)
3. Kuwa qaybta ka ah dib u cusboonaanaya ee abuurta cusub noqonaya (Tusaale ahaan. Caamoos 9:11-15)

Qoraalkan dhexdiisa Ilaah wuxuu ku dooranayaa qaar keliya (kuwii rumaysadka qiirada lahaa) ku sugaye (kuwii ka soo samato baxay masaafuriskii) si ay dib ugu soo laabtaan Yuhuuda. Sidii aan cutubkan hortiis soo aragnay, maaddada ah dib u soo celinta Israa’iil sida ku jirta (aayadda 6) Ilaah wuxuu ku yaraynayey tiradooda si uu u tuso awooddiisa, hawshiisa iyo daryeelkiisa (tusaale ahaan, Gidicoon, Xaakinnadii 6-7).

rumaysadka, laakiin intooda badani waxa ay ahaayeen kuwo aan rumaysad lahayn.

28:28 “in badbaadadan Ilaah loo soo diray dadka aan Yuhuudda ahayn” Dabcan tani waxa ay si maldahan tilmaamaysaa Sabuurka 67, gaar ahaan aayadda. 2. Aragtida caamka ah ee Masiixiyadda ayaa ah wixii qalalaaasaha ku abuuray Yerusaleem oo dhibaato aan joogsan ayey u noqotay Yuhuud badan. Tani waa mid si caadi ah looga arki karo Bilogii. 1:26,27; 3:15; 12:3. Waxaa lagu sii sheegay Ishacyaah, Miikaah, iyo Yoonis. Waxaa si cad loogu sheegayaa in uu yahay qorshaha Ilaah ee weligiis ahsida ku diwaan gashan Efesos. 2:11-3:13! Mawduuc Gaar ah ka eeg: 1:8.

▣ **“oo iyaguna way maqli doonaan”** Tani waa runta ku jirta Rooma 9-11. Yuhuuddu way diideen Masiixa maxaa yeelay muusan buuxin wixii ay ka filanayeen sababtuna waxa ay tahay in injiilku uu irrid badbaado u furay dadka oo dhan. Waxa injiilka ku jira ee uu ka hadlayo ma aha Yuhuud ka soo hor jeeda kuwa aan Yuhuudda ahayn, laakiin rumaystaasha oo ka soo hor jeeda kuwa aan rumaysadka lahayn. Arrintu ma ahan hooyadaa yey tahay, laakiin waa, miyuu qalbigaagu u furan yahay Ilaah Ruuxiisa Qudduuska ah iyo Wiilkiisa?!

28:29 Aayaddani waa ay ka maqan tahay qoraalladii hore ee Giriigga ee P74, x, A, B, iyo E. Kama muuqato qoraalka Giriigga inta ka horraysa P, oo taariikhdeedu tahay qarnigii lixaad A.D. UBS4 wuxuu la maqnaanteeda

NASB (UPDATED) TEXT: 28:30-31

³⁰Oo laba sannadood oo dhan ayuu iska degganaa hoy uu isagu kiraystay, oo kulli intii u soo gashay oo dhanna wuu soo wada dhoweyey. ³¹Oo isagoo aad u dhiiran ayuu wuxuu ku wacdiyi jiray boqortooyada Ilaah, wuxuuna bari jiray waxyaalaha ku saabsan Rabbi Ciise Masiix, cidnana uma diidin.

ku qiimaynayaa “A” (waa sax).

28:30 “laba sannadood oo dhan” Tani waxa ay ugu dhawaan ahayd

1. waqtigii caadiga ahaa ee loo baahnaa in la arko kaysar
2. waqtigu wuxuu u baahnaa in la helo warqad ka tilaadda Feestos
3. go'aankana waxaa lala sugayey marqaatiyaashii ka imanayey aasiga iyo Yerusalaam
4. mid ku xidhan sharci xadaysan

Waqtigan gudihiisa ayey ahayd markii uu Bawlos waraaqihiisa ku qoray xabsiga dhexdiisa (Kolsay, Efesos, Filemon, iyo Filiboy).

▣ **“ayuu iska degganaa hoy uu isagu kiraystay”** Bawlos xoogaa dhaqaal soo gala ayuu haystay.

1. wuxuu klu shaqeyay teendho sameeye iyo harag sameeye
2. waxaa caawinayey kaniisadaha (Tesaloniika iyo Filibbi)
3. wuxuu haystay dhaqaale uu dhaxlay

▣ **“soo wada dhoweeyey”** Luukos waxa uu ereygan u adeegsadaa “soo dhaway qalbi ah” (cf. 18:27; 28:30 iyo *paradechÇmai* sida ku jirta 15:4). Waxaa loo isticmaalaydadkii badnaa ee Ciise soo dhaweeyay sida ku jirta 8:40 and 9:11. Waxaa lagu isticmaalay soo dhawaynta injiilka sidii uu Butros ku wacdiyey ee ku Falimaha rasuullada 2:41.

▣ **“intii u soo gashay oo dhanna”** Tan ayey dhibaataadu ahayd. Injiiilka Yooxanaa waxa uu lahaa gaadhid caalamka oo dhan ah. Waxa uu u ahaa “war wanaagsan” aadanaha oo dhan, ma aha Yuhuudda oo qudha!

28:31 “wacdiyi jiray. . . bari jiray” Kaniisaddii hore, ee rasuullada ee sii horraysay waxa ay ku soo koobeen labo ha boo runta lagu soo ban dhigo, qaabkii guud ahaaneed ee uu kulanka kaniisadu ahayd sida ku diwaan gashan (Butros, Istefanos, Bawlos) oo waxaa loogu yeedhaa *Kerygma* (shaacin, cf. 20:25; 28:31; Rooma. 10:8; Galatiya. 2:2; I Korintos. 9:27; II Timoteyos. 4:2), halka wax-bariddoo Ciise ee lagu dhex tarjumay waraaqihii rasuullada oo loogu yeedho *Didache* (waxbarin, cf. 2:42; 5:28; 13:12; Rooma. 16:17; I Korintos. 14:20).

▣ **“boqortooyada Ilaah”** Tani waxa ay ahayd wixii wacdigii ciise salka u ahaa. This was the subject of Jesus’ preaching. Waxa ay tilmaamaysaa xukunka Ilaah ee ku jira aadanaha qalbiyadooda oo ay ahayd in mar uun ay adduunka si la mid sidii ay samada ka ahayd. Qoraalkan wuxuu sidoo kale muujinayaa mawduucu uusan ku saabnayn. Mawduuc Gaar ah ka eeg: 1:3.

▣ **“Rabbi”** “Rabbi” waa tarjumaadda ereyga Cibraaniga ah *adon*, oo macnihiisu yahay “milkiile, guuleed, taliye, ama rabbi” (Mawduuc Gaar ah ka eeg: 1:6). Yuhuuddu waxa ay ka baqeen ku dhawaaqidda magaca Ilaah ee YHWH maaddaama ay guuldarro ku jiraan oo ay jebinayaan mid ka mid ah Tobankii ama. Mar kasta oo ay aqriyaan Qorniinnada, ayey magaca YHWH utaagane uga dhigeen. Tani waa sababta ay tarjumaadaha Ingiriisigu u adeegsadaan ereyda waaweyn ee LORD marka ay YHWH qorayaan Axdigii Hore Dhexdiisa. In magacan loo beddelo (*kurios* sida ku jirta Giriigga) oo ah Ciise, Axdiga Cusub qoraayaashiisu waa ay ka saarayaan Ilaahnimadiisa oo Aabbaha ayey la simayaan.

▣ **“Ciise”** “Ciise” waa magacii ay malaa’igtu u bixisay wiilkii yaraa Betlexem sida ku jirta (cf. Matayos. 1:21). Waxa uu magacani ka kooban yahay mabo magic oo afka Cibraaniga ah: “YHWH,” magacii Ilaah ee Axdigii Hore ku jiray, iyo “badbaado” (i.e., Hosheeca). Waxa uu la mid yahay Magaca Cibraaniga ah ee Yashuuca. Marka keligeed la isticmaalo waxa ay muujinaysaa Ciisaha reer Naasaret, Maryan Wiilkeedii (tus., Matayos. 1:16, 25; 2:1; 3:13,15,16).

▣ **“Masiix”** “Christ” waa tarjumaad Giriig ah oo ka yimid afka Cibraaniga ku ah *Messiah* (i.e., Kiil la Subkay, ka eeg Mawduuca Gaarka ah: 2:31). Waxa ay tilmaamaysaa in magaca Ciise uu ahaa kii uu YHWH ballan qaaday si uu u keeno faca cusub ee xaqnimada.

▣

NASB
NKJV

“cidnana uma diidin, si furan”

“si kalsooni ku jirto, oo uusan midka ka xarrimayn”

NRSV “si furan oo qarsoodi la’aan ah”
TEV “isagoo si curan oo xor ah u hadlaya”
NJB “si cabsi la’aan ah oo aanu qofna ka qarinyin”

Aayaddani waxa ay muujinaysaa kuwii Rooma ee amarrada lahaa aysan Masiixiyadda u arkayn wax Qatar ah. Qoraalka Giriiggu waxa uu ku dhammaanayaa falkaabaha “unfettered” ama “unhinderedly” oo macnahoodu yahay “mid aan la joojin Karin” ama “aan qarsoonayn.” Tani waxa ay u muuqataa in ay xoojinayso dabeecadda socota ee arrinta shaacinta iyo awoodd Ruuxa Qudduuska ah. Kuwo badan waxa ay u maleeyeen, sida ku salaysan Falimaha rasuullada 1:1 ka faa’idaysi “koow,” oo tilmaamahya in wax ka badan labo, uu Luukos qorsheeyay inuu qoro majalladda saddexaad. Qaar xitaa waxa ay u maleeyeen in majalladdan saddexaad ay dabcan noqon lahaayeen warqadihii wadaaddada wacdiyeyasha kaniisadda sida (I Timoteyos, II Timoteyos iyo Tiitos). Ereyga Giriigga (*parrhēsia*), waxaa uu NASB ku tarjumayaa “furnaan,” ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee 4:29.

SU’AALO FALQAYNEED

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sababtee ayuu kitaabka falimaha Rasuulladu ugu dhammaanayaa Bawlos oo xabsiga ku jira? Oo sababtee ayuu si degdeg ah ugu dhammaanayaa?
2. Sababtee buu Luukos waqti dheer u siinayaa ka sheekaynta safarkii Bawlos iyo joogistiisii Rooma?
3. Sababtee buu bawlos had iyo goor isugu dayaa inuu marka koowaad u marqaati furo Yuhuudda?
4. Sahrraxaad ka bixi farqiga u dhexeeya *Kerygma* iyo *Didache*.

LIFAAQA KOWAAD

QEEXITAANKA KOOBAN EE NAXWAHA ERAYADA GIRIIGGA

Luqadda Giriigga ee Koine waxa xitaa lagu magacaabi jiray Hellenistic, waxaanay ahayd luqadda ay ku hadli jireen dadkii ku noolaa Medhetareeniyanka ilaa lagasoo bilaabo furashadii Aleksandarkii Waynaa (336-323 C.H) iyo ilaa laga soo gaadho sideedii boqol ee sanadood ee ka dambaysay (300 C.D-500 C.D). may ahayn oo keliya luqadda Giriigta assalka ah, laakiin siyaabo badan ayay u noqotay qaab cusub oo ah luqada Giriigta, waxaanay noqotay luqada labaa ee dadkii wakhtiyadii hore ku noolaa bariga Medhetareeniyanka.

Luqadda Giriigga ah ee Axdiga Cusubi waxay ahayd mid gooni ah siyaabo badan marka loo eego, maxaa yeelay kuwii adeegsan jiray marka laga reebo Luukos iyo qoraaga Cibraaniyada, oo iyagu adeegsaday luqadda Aramaatiga. Haddaba, qoraalkooda waxa saameeyay erayada iyo qaababka luqada Aremaatiga. Waxa kaloo ay akhriyeen waxna kasoo xigteen Septuagint tarjumaaddiisa Axdiga Hore, oo sidoo kalena ku qoraan luqada Koine ee Giriigta. Laakiin waxa iyana sidoo kale jirtay in Septuagint ay qoreen culimadii Yuhuudda ahaa oo luqadooda hooyo aanay ahayn Giriig.

Tani waxay haddaba ina xasuusinaysaa in Axdiga Cusub aynaan qaab naxwe ahaaneed isugu dhejin karin. Waa mid gaara waxaanay waxyaabo badan ka wadaagaan (1) Septuagint ga; (2) qoraallada Yuhuudda sida s kuwo Josephus; iyo (3) papyri yada laga helay Masar. Sideen haddaba u samayn karnaa qaabka naxwe ahaaneed ee Axdiga Cusub?

Qaabka naxwe ahaaneed ee luqada Giriigga ee Koine iyo koine ka Giriigga ee Axdiga Cusubi waa kuwo aad u faro badan. Siyaabo badan waxay u ahayd wakhti uu jiray fududaynta naxwuhu, waxaana marwalba ina hagaya qoraalka. Waayo erayadu waxay macno ku sameeyaan qoraalka badan, sidaasi darteedna qaabka naxwe ahaaneed waxa lagu fahmi karaa oo keliya (1) qaabka gaar ahaaneed ee qoraagu wax u qoro; iyo (2) qoraalka gaarka ah. Ma jiro haddaba qeexitaan suurto gala isla markaasna lagu qanci karo oo ah qaab dhismeed Giriig ah.

Luqada Koine ka ee Giriigtu waxay ahayd luqad lagu hadlo, sidaasi darteedna marwalba furaha fasiraaddu waxay ku dhisantahay nooca iyo qaabka hadalka. Badanaa jumladaha gaabanna falka ayaa xagga hore imanaya isagoo tusinaya muhiimadda. Marka haddaba la furfuro falka Giriigga ah waxa jira saddex waxyaalood oo uu gudbinayo: (1) waxyaalaha xoogga ay saarayso dhacdadu, codka iyo xaaladda lagu jiro (shil amaba tusaale); (2) macnaha asal ahaaneed fal gaar ah; iyo (3) raacitaanka qoraalka.

I. DHACDO

A. Dhacdadu waxay koobsanaysaa xidhiidhka falka ee dhammayska tiran amaba aan dhammayska tirnayn. Waxaana lagu magacaabaa “hagaagsan” iyo “midaan hagaagsanayn.”

1. Dhacdada hagaagsani waxay diiradda saartaa saxsanaanta falka. Mana jirto faahfaahin dheeraada oo la bixinayo marka laga tago sheegitaanka inay wax dhaceen oo keliya. Lamana sheego meesha ay ka bilaabanto, sii socodkeeda iyo halka uugu sarraysa.
2. Dhacdada aan hagaagsanayni waxay diiradda saartaa sii socoshada falka, waxaana lagu tilmaami karaa fal toosan, fal muddo ama wakhti ah, fal soconaya, iwm.

B. Dhacdooyinka waxa lagu kala saari karaa sida qoraagu u arko falka isaga oo soconaya

1. Siday u dhacayso = AORIST
2. Dhacitaankeeda iyo natijada la socota oo daa’ima = PERFECT
3. Waxay ahayd markii hore mid dhacaysa natijoo daa’imana leh, laakiin hadda waa = PLUPERFECT
4. Way dhacaysaa = PRESENT
5. Way dhici doontaa = IMPERFECT
6. Way dhici doontaa = FUTURE

Tusaalaha runta ah ee caawin kara tarjumaadda dhacdadu wuxuu noqon karaa erayga “badbaadin.” Waxaana loo adeegsaday dhacdooyin badan oo kala duwan iyadoo la toosinayo siday u dhacayso iyo heerka ay marayso:

1. AORIST “badbaaday” (Rooma 8:24)
2. PERFECT “la badbaadiyay iyadoo natiijaduna socoto”(Efesos 2:5,8)
3. PRESENT “badbaadaya” (1 Korintos 1:18; 15:2)
4. FUTURE “badbaadi doona”(Rooma 5:9, 10; 10:9)

C. Marka aan eegno falalka dhacdooyinka, fasariyaashu waxay eegaan sababta asal ahaan qoraagu naftiisa uugu sheegayo dhacdo gaara. Heerka “sharraxaad la’aantu” dhacdadu wuxuu ahaa AORIST. Waxaana weeyi “aan khaas ahayn,” qaabka caadiga ah ee falka. Waxaana loo adeegsan karaa siyaabo kala duwan oo qoraalka aayaddu uu sheegi karo, oo asal ahaanna waxay ka hadlaysaa sida wax u dhacayaan. Xagga dhacdada tagtay wakhti hore waxa macneheedu yahay wax tegay oo la xallin rabo. Haddii markaas dhacdo kale la adeegsano waxa jira waxyaabo intaas ka badan oo xoogga la saarayo. Laakiin muxuu yahay?

1. PERFECT TENSE. Wuxuu ka hadlayaa fal la dhammays tiray oo natiijo daa’im ahna leh. Mararka qaar waxay isugu jiri kartaa AORIST iyo PRESENT TENSES. Hadiyo goor haddaba waxa ujeedadu tahay in falku dhammays tirmay natiijona ka imanayso. Tusaale ahaan Efesos 2:5 iyo 8, “waa la idin badbaadiyay oo badbaadana waxaanad ahaan doontaan kuwo lasii badbaadiyo.”
2. PLUPERFECT TENSE. Wuxuu ahaa sida wax hagaagsan marka laga reebo natiijada oo istaagtay. Tusaale ahaan “Butrus wuxuu taagnaa albaabka dibadda”(Yooxanaa 18:16).
3. PRESENT TENSE. Wuxuu ka hadlayaa fal aan toosnayn amaba aan dhammays tirnayn. Ujeedaduna waa hadiyo goor dhacdada oo sii socota. Tusaale ahaan “Ku alla kii isaga ku sii jiraa, ma dembaabo,” “Ku alla kii Ilaah ka dhashay dembi ma falo” (1 Yooxanaa 3:6 iyo 9).
4. IMPERFECT TENSE. Dhacdadani xidhiidhka ay la leedahay PRESENT TENSE gu waxay la mid tahay xidhiidhka ka dhexeeya PERFECT iyo PLUPERFECT. Wuxuu ka hadlayaa IMPERFECT gu dhacdo aan dhammays tirnayn oo dhacaysay laakiin la joojiyay amaba bilowga fal tegay. Tusaale ahaan: “waxaa u soo baxay dadka Yerusaleem” (Matayos 3:5).
5. FUTURE TENSE. Wuxuu ka hadlayaa fal dhici doona wakhtiga mustaqbalka ah ee iman doona. Wuxuu ka hadlaa dhacdo badanaa suurto gal noqon karta, waxaanu hadiyo jeer tilmaamaa suurto galnimada dhacdadaas. Tusaale ahaan: “Waxa barakadaysan...oo waxay” (Matayos 5:4-9).

II. COD

- A. Codku wuxuu sheegaa xidhiidhka ka dhexeeya dhacitaanka falka iyo fal sameeyaha oo ah kan samaynaya falka.
- B. ACTIVE VOICE waa codka tooska ah ee la filayo iyadoo si xooggan aan loo sheegay in faluhu uu sameeyay falka.
- C. PASSIVE VOICE codka aan tooska ahayn macnihiisuna waa fal sameeyaha oo helaya fal isaga dibadda lagaga sameeyay. Falsameeyaha dibadda ah Giriigga Axdiga Cusub waxa lagu sheegaa meeleyayaashan:
 1. Adeege shakhsi ahaaneed oo ah *hupo* lana socdo xaalad abuuruhu(Matayos 1:22; Falimaha Rasuullada 22:30).
 2. Adeege shakhsi ahaaneed oo ku dhexdhexaadinaya *dia* lana socdo xaalad abuuruhu (Matayos 1:22).
 3. Adeege aan shakhsi ahaan ahayn oo ku imanaya *en* kuna yimid qalab.
 4. Mararka qaarna wuxuu ku yimaaddaa mid shakhsi ahaaneed iyo mid aan shakhsi ahaan ahayn oo ku yimaadda qalab.
- D. MIDDLE VOICE oo ah kan falka samaynaya iyo inuu si toosa ugu lug leeyahay samaynta falka. Waxaana hadiyo goor lagu magacaabaa codka dareen ahaaneed ee ku xidhan doonista shakhsiga. Qaab dhismeedkanina waxa uu dhinac ka xoogaynayaa weedhaha fal sameeyahaha, mana aha mid laga helo luqada Ingiriisida oo keliya, waxaanay suurta galnimo wayn ku leedahay macnaha iyo tarjumaadaha luqada Giriigga. Tusaale ahaan:

1. REFLEXIVE waana falka tooska ah ee fal sameeyuhu naftiisa ku sameeyo. Tusaale ahaan: “isdeldelay.” (Matayos 27:5).
2. INTENSIVE falsameeyaha ayaa falka laftiisa ka dhigaya inuu isu sameeyo. Tusaale ahaan: “Shaydaanka qudhiisu wuxuu isu ekaysiiyaa malaa'igta iftiinka” (2 Korintos 11:14).
3. Reciprocal – wax is dhaafsiga labada fal sameeye. Tusaale ahaan: “waxay ka wada hadleen” (Matayos 26:4).

III. DAREEN

- A. Waxa jira afar dareen oo ka muuqda luqada Koine ga ee Giriigga. Waxaanay tilmaamayaan xidhiidhka ka dhexeeya falku la leeyahay xaqiiqada ugu yaraan marka la eego waxa qoraaga ujeedadiisu tahay ee maankiisa ku jira. Dareennada haddaba waxa loo qaybiya labo qaybood oo waawayn: waana inuu tilmaamayo xaqiiqada (INDICATIVE) iyo inuu tilmaamayo suurto galnimada (SUBJUNCTIVE, IMPERATIVE iyo OPTATIVE).
- B. INDICATIVE MOOD wuxuu ahaa dareen caadi ah oo sheegaya falka dhacay amaba dhacayay ugu yaraan marka la eego qoraaga maankiisa. Waxaanay ahayd dareen keliya oo lagu sheegay wakhti gaara laakiin tani waxay ahayd dheeraad.
- C. SUBJUNCTIVE MOOD ku wuxuu sheegayaa suurto galnimada falk mustaqbalka dhici doona. Waa waxaan weli dhicin laakiin jaanisyadiisu waxay u eegyihin inuu dhici doono. waxaanu waxyaabo badan la wadaagaa FUTURE INDICATIVE ka, laakiinse farqiga u dhexeeyaa waxa uu yahay iyada oo SUBJUNCTIVE ku uu sheegayo heer shaki ah, waana midda luqada Ingiriisiga lagu cabiro iyadoo la odhanayo “could,” “would” “may” amaba “might” (laga yaabee, waxa dhici karta,).
- D. OPTATIVE MOOD ka waxa lagu sheegaa dareen doonis ah amaba jeclaysi iyadoo aragti ahaanna suurto gal ahayd. Waxa lagu tilmaamaa inuu xaqiiqada uuga dhowyahay SUBJUNCTIVE ka, waxaana OPTATIVE ka lagu sheegaa suurto galnimada hoos joogta xaalado la hubo, sidoo kalena OPTATIVE ku wuxuu naadir ku yahay Axdiga Cusub dhexdiisa. Waxa haddaba adeegsaday Bawlos “yaanay noqon” (KJV “Ilaahbaa xarrimay”), shan iyo toban jeer (Rooma 3:4,6,31; 6:2, 15; 7:7, 13; 9:14; 11; 1 Korintos 6:15; Galatiya 2:17; 3:21; 6:14). Tusaalayaasha kalena waxa laga helayaa Tesaloniika 1:38. 20:16, Falimaha Rasuullada 8:20, iyo 1 Tesaloniika 3:11.
- E. IMPERATIVE MOOD waxa lagu xoojiyay amar ahaa suurto gal, laakiinse xoojintu waxay ahayd ujeeddada qofka hadlayay. Waxay sheegaysaa oo keliya suurto galnimada doonista shuruuda ku xidhanina waa doorashada qofka kale. Waxa si gaara IMPERATIVE ka loo adeegsaday tukashooyinka iyo codsiga qofka saddexaad. Amarradan waxa haddaba Axdiga Cusub waxa lagaga dhex heli karaa iyagoo ah dhacdooyinka PRESENT iyo AORIST.
- F. Naxwayaasha qaarkood ayaa ayaa ayaa falka tilmaamaya sida wax loo qabto waxay ku tilmaamayaan mid ka mida dareenka. Aad bay ugu dhex badanyihiin Axdiga Cusub ee Giriigga ah, hadiyo goorna waxa lagu tilmaamaa fal lagu hadlo. Waxa loo tarjumay isagoo isku xidhaya falka muhiimka ah ee ay la xidhiidha falka. Waxa jira haddaba farqi wayn oo u dhexeeya marka la tarjumayo falalka tilmaamaya sida wax loo qabtay, waxaana fiican in lagala tashado tarjumaadaha kala duwan ee Ingiriisida. Waxaana ku caawin kara *The Bible in Twenty Six Translations* oo uu qoray Baker.
- G. AORIST ACTIVE INDICATIVE wuxuu ahaa mid si caadi ah amaba “aan lataabanin” u diiwaan geliya dhacdooyinka. Dhacda kasta oo kale ha ahaato cod amaba fasiraad kale oo gaar ahee, muhiimaddeedu waxa weeyi qoraaga asalka ahi midda uu rabay inuu xidhiidhka ku sameeyo.

IV. Qofka aan Giriigga ahayn fikradaha waxbarashadan soo socota ayaa siin karta macluumaadka uu rabo.

- A. Friberg, Barbara iyo Timothy. *Analytical Greek New Testament*. Grand Rapids: Baker, 1988.

- B. Marshall, Alfred. *Interlinear Greek-English New Testament Greek*. Grand Rapids: Zondervan, 1976.
- C. Mounce, William D. *The Analytical Lexicon to the Greek New Testament*, Grand Rapids: Zondervan, 1993.
- D. Summers, Ray. *Essentials of New Testament Greek*. Nashville: Broadman, 1950.
- E. Luqada Koine ee Giriigta barashadeeda oo fogaan dirsi ah waxa ay diyaar ku tahay Moody Bible Institute ee Chicago, IL.

V. MAGACYADA

- A. Magacyada waxa lagu kala saaraa xaalado. Xaaladuhu waxay ahaayeen kuwa saamaynaya magaca tusinaya magaca la xidhiidha falka iyo qaybaha kale ee weedha. Marka aan eegno luqada Koine ee Giriigga kuwo badan oo xaaladdan ahi waxay ku shaqaynayeen oo lagu tilmaamay meeleeeyayaal. Maadaama oo xaaladdani ahayd mid awood u leh in lagu magacaabo xidhiidho badan ayaa meeleeeyaha waxa laga dhigay inuu siiyo inuu kala saaro siyaabaha caqli galka ah ee ay u shaqaynayaan.
- B. Xaaladaha Giriigga waxa loo kala saaraa sideed siyaabood:
 1. NOMINATIVE CASE waxa loo adeegsaday magacaabista waxaanu hadiyo goor ahaa falaha weedha. Waxa sidoo kale loo adeegsaday PREDICATIVE NOUNS ka iyo ADJECTIVES ka amaba sifooyinka iyadoo lala xidhiidhanayo falalka “ahaanshaha” amaba “noqoshada.”
 2. GENITIVE CASE ka oo loo adeegsaday qeexitaanka iyo hadiyo goorba tayada erayga la xidhiidha. Waxay ka jawaabtay su’aasha, “Noocee?” waxa sidoo kale lagu sheegay adeegsiga meeleeeyaha luqada Ingiriisada ee “of.”
 3. ABLATIVE CASE waxa loo adeegsaday si la mida GENITIVE ka laakiin waxa loo adeegsaday qeexitaanka lagu sheegayo kala soocnaanta. Waxay hadiyo goornaa tilmaanta ka soocnaanta meel ee wakhti dhexdiisa, banaan, asal amaba darajo.
 4. DATIVE CASE waxa loo adeegsaday qeexitaanka danaha shakhsi ahaaneed, waxaanay tilmaami kartaa oggolaansho amaba diidmo. Waxa hadiyo goorba luqadah Ingiriisida lagu tilmaamay meeleeeyaha “to.”
 5. LOCATIVE CASE waxay la mid tahay sida DATIVE ka, laakiin wuxuu tilmaamayaa meel , wakhti amaba waxyaalaha caqli galka ah. waxaana hadiyo goorba lagu sheegaa meeleeeyaha Ingiriisida ah ee “in, on, at, amont, during, by, upon, iyo beside.”
 6. INSTRUMENTAL CASE waxay la mid tahay xaaladaha DATIVE ka iyo LOCATIVE ka. Waxaanu sheegay macnaha amaba urur. Waxaana lagu sheegaa meeleeeyaha Ingiriisida ah ee, “by” amaba “with.”
 7. ACCUSATIVE CASE waxa loo adeegsaday sheegitaanka gebogebada falka, waxaana lagu sheegay xaditaanka, oo adeegsigeeda ugu muhiimsanina wuxuu ahaa shay toos ah. wuxuu ka jawaabay su’aasha, “intee in leeg?”
 8. VOCATIVE CASE waxa loo adeegsaday hadal toos ah.

VI. ISKU XIDHAYAASHA IYO XIDHIIDHIYAYAASHA

- A. Luqada Giriigga waxay aad sax u ah maxaa yeelay waxay haystaa xidhiidhiyayaal badan. Waxay isku xidhaan fikirrada (erayada gaagaaban, weedhaha, iyo baaragaraafyada). Haddaba isku xidhayaashani waxay tusinayaan jihaynta fikirka qoraaga, waxaanay muhiim u yihiin qeexitaanka waxyaalaha uu isku dayay inuu ka hadlo.
- B. Halkan waxaan kusoo qaadan karnaa kuwo ka mida xidhiidhiyayaasha iyo isku xidhayaasha iyo macnohooda (waxaana lagasoo xigtay H. E. Dana iyo Julius K. Mantey buugooda *A Manual Grammar of the Greek New Testament*).
 1. Xidhiidhiyayaasha wakhtiga

- a) epei, epeid e, hpote, hos, hote, hotan (fal sameeyaha) – “goorma”
 - b) hoes – “kolki”
 - c) hotan, epan (falsameeyaha.) – “markasta”
 - d) hoes, achri, mechri (falsameeyaha.) – “ilaa”
 - a. *priv* (dhamaad lahayn.) – “kahor”
 - b. *hos* – “ilaa,” “goorma” “sida”
2. Xidhiidhiyayaasha caqli galka ah
- a. Ujeeddo
 - 1. *hina* (fal sameeye.), *hopos* (falsameeye.), *hos* – “si ay,” “kaa”
 - (2) *hoste* (aan la xadidi karin) “kaa”
 - (3) *pros* (aan la xadidi karin) ama *eis* (oon la xadidi karin) – “kaa”
 - b. Natiijo (waxa jirta is kaashi u dhexeeya qaababka naxwe ahaaneed ee ujeeddo iyo natiijo)
 - (1) *hoste* (dhammaad lahayn, kani waa ka uugu badan) – “si ay,” “hadaba”
 - (2) *hiva* (fal sameeye) – “inaad”
 - (3) *ara* – “sidaa darteed”
 - c. Sabab
 - (1) *gar* (sabab/saamayn/ gebogebo) – “calashaan” “maxaa yeelay”
 - (2) *dioti, hotiy* – “maxaa yeelay”
 - (3) *epei, epeide, hos* – “ilaa”
 - (4) *dia* (la socoto dacwayn) iyo (la socota dhammaad la’aan) – “maxaa yeelay”
 - d. Fahmitaan
 - (1) *ara, poinun, hoste* – “dabadeed”
 - (2) *dio* (fahmitaanka ugu xooggan xidhiidhiyaha) “xaqiiqadii,” “dabadeed”
 - (3) *oun* “dabadeed,” “sidaa daraadeed” “kadib” “waxa ka danbeeya”
 - (4) *toinoun* – “marka loo eego”
 - e. Farqiga
 - (1) *alla* (farqiga xooggan) “laakiin” “laga reebo”
 - (2) *de* – “laakiin,” “si kastaba ha noqotee,” “balse,” “dhinaca kale”
 - (3) *kai* – “laakiin”
 - (4) *metoi, oun* – “si kastaba ha noqotee”
 - (5) *plen* “si kastaba ha ahaatee,” (waxay ku badantahay Luukos)
 - (6) *oun* – “si kastaba ha noqotee”
 - f. Isbarbar dhigga
 - (1) *hos, kathos* (bilowga weedhaha is barbar yaal)
 - (2) kata (*lakab ku ah, katho, kathoti, kathosper, kathaper*)
 - (3) *hosos* (Cibraaniyada)
 - (4) *e* – “ka”
 - g. Xidhiidhsanaanta
 - (1) *de* – “iyo,” “imika”
 - (2) *kai* – “iyo”
 - (3) *tei* – “iyo”
 - (4) *hina, oun* – “kaa”
 - (5) *oun* – “kadib” (Yooxanaa)
3. Adeegsiga xoogaynta
- a. *alla* – “hubaashii,” “haa,” “xaqiiqadii”
 - b. *ara* – “hubaal” “runtii”
 - c. *gar* – “laakiin runtii,” “hubaashii”
 - d. *de* – “runtii”
 - e. *ean* – “xिताa”
 - f. *kai* – “xिताa,” “runtii,” “runtii”
 - g. *mentoi* – “runtii”
 - h. *oun* – “runtii,” “xaqiiq ahaantii”

VII. WEEDHAHA SHURUUDU KU XIDHANTAHAY

- A. Weedhaha shuruuddu ku xidhantahay waxa weeyi kuwa ay la socoto in ka badan hal weedha oo gaaban isla markaasna shuruudi ku xidhan tahay. qaab dhismeedkan naxwe ahaaneedna wuxuu caawinayaa fasiraadda, isagoo bixinaya shuruudo amaba sababo ku salaysan, sababta falka muhiimka ahi uu saxda u yahay amaba u khalidan yahay, waxaana jira afar nooc oo ah weedhaha shuruuddu ku xidhan tahay.
- B. FIRST CLASS CONDITIONAL SENTENCE wuxuu yahay amaba ahaa fal u muuqda in qoraaga uu run sheegayo, isla markaasna uu rabo inuu ku sheego ujeedadiisa, sida “haddii.” Waxa kaloo jirta in qoraallo kale loo tarjumay “ilaa” (Matayos 4:3; Rooma 8:31). Si kastabana ha noqotee sheegitaanka runta amaba beenta. Marar badan waxa loo adeegsaday tilmaamitaanka doodda amaba hadalka (Matayos 12:27).
- C. SECOND CLASS CONDITIONAL SENTENCE waxa badanaa lagu magacaabaa “soo jeedinta xaqiiqada.” Waxaanay sheegaysaa waxaan run ahayn oo raba inuu wax sameeyo. Tusaale ahaan:
1. “Ninkan hadduu nebi yahay, wuu ogaan lahaa naagtan taataabatay cid ay tahay iyo waxay tahay inay tahay dembiiley” (Luukos 7:39).
 2. “haddaad Muuse rumaysateen, anigana waad i rumaysan lahaydeen” (Yooxanaa 5:46).
 3. “Haddaan weli dadka ka sii farxinayo, ma aanan ahaadeen addoonkii Masiixa” (Galatiya 1:10).
- D. THIRD CLASS qofka saddexaad oo ka hadlayay falka mustaqbalka ah suurto galnimadiisa. Wuxuu hadiyo jeer ku saabsan yahay suurto galnimada falkas, waxaanu hadiyo goorba falkiisa muhiimka ahi ku yimaadaa weedha gaaban ee “ay.” Tusaale ahaan 1 Yooxanaa 1:6-10; 2:4,6,9,15,20,21,24,29; 3:21; 4:20; 5:14,16.
- E. FORTH CLASS waxa laga saaray suurto galnimada, waxaanu in badan ka dhex muuqdaa Axdiga Cusub. Xaqiiq ahaantii ma jiro weedhan inay labadeeda shuruudoodba noqon karaan kuwo la qeexi karo. Waxaan tusaale ahaan middan oo kale uugu soo qaadan karnaa weedha gaaban oo furitaanka u ah 1 Butros 3:14. Xagga gebogebaynta waxaan tusaale ahaan uugu soo qaadan karnaa Falimaha Rasuullada 8:31.

VIII. REEBISTA AMA MAMNUUCISTA

- A. PRESTN IMPERATIVE ka uu la socdo MEPATKCLE wuxuu hadiyo jeer xoojinayaa joojinta fal hore u socday ilaa haddadna shaqaynaya. Waxa ka mida tusaalayaasha: “Maal ha ku urursanina dhulka...” (Matayos 6:19); “Ha ugu welwelina naftiinna...” (Matayos 6:25); “Xubnihiinnana dembiga ha u siinina...” (Rooma 6:13); “Ha calool xumaynina Ruuxa Qoduska ah oo Ilaah...” (Efesos 4:30); iyo “Ha ku sakhraamina khamriga rabshadu ku jirto...” (5:18).
- B. AORIST SUBJUNVTIVE uula socdo MEPARTICLE wuxuu xoojinayaa “ha bilaabin falkaas.” Tusaale ahaan: “Ha u malaynina inaan...” (Matayos 5:17); “ha ku welwelina,” (Matayos 6:31); “ha ka xishoon..” (2 Timoteyos 1:8).
- C. DOUBLE NEGATIVE ka uu la socdo SUBJUNCTIVE MOOD waxa weeyi wada hadal xooggan. “weligiis waxaasi kuma dhici doonaan.” Tusaale ahaan: “weligiis dhimasho ma arki doono” (Yooxanaa 8:51); “..hilib weligay ma cuni doono” (1 Korintos 8:13).

IX. SHAQALKA

- A. Marka la eego luqada Koine ee Giriigga DEFINITE ARTICLE ka “the” wuxuu la midyahay kan Ingiriisida, waxaanu ahaa tilmaamaha dareenka siinaya magaca amaba cibaaro. Haddaba, adeegsigeedu

wuu ku kala duwan yahay qoroyaasha Axdiga Cusub, waxaanu sidoo kale DEFINITE ARTICLE ku ku shaqayn karaa

1. Isaga oo wax kala saaraya sida magac u yaalka oo kale;
2. Isaga oo ah calaamad tilmaamaysa falsameeyaha amaba qof hore loo soo tilmaamay;
3. Isaga oo magacaabaya fal sameeyaha weedha ku dhex jira markaasna la xidhiidhaya falka. Tusaale ahaan: “Ilaah waa Ruux” Yooxanaa 4:24; “Ilaah waa iftiin,” 1 Yooxanaa 1:5; “Ilaah waa jacayl,” 4:8,16.

B. Luqada Koine ee Giriigtu ma laha INDEFINITE ARTICLE ka Ingriisida ah ee “a” amaba “an.” Waxaanu taas macneheedu noqon karaa:

1. Diirad saarista qaabka amaba tayada uu wax leeyahay
2. Diirad saarista nooca uu shay leeyahay.

C. Qorayaasha Axdiga Cusubi waxay si waynu ugu kala duwan yihiin sida loo adeegsado ARTICLE ka amaba Shaqalka.

X. SIYAABAHA ADKAYNTA AMABA XOOJINTA EE AXDIGA CUSUB EE GIRIIGGA AH.

A. Qaabka amaba siyaabaha muujinaysa adkaynta amaba xoojintu wuxuu yahay mid ay ku kala duwan yihiin qorayaasha Axdiga Cusubi. Kuwa markaas ugu badan ee sida joogtada ah aanay adkayntoodu isu bedelaynin waxay ahaayeen Luukos iyo qoraaga Cibraaniyada.

B. Waxaan hore usoo sheegnay in AOURIST ACTIVE INDICATIVE ku inuu ahaa heer laguna tirinin xoojinta, laakiin dhacdooyinka kale oo dhan sida codka amaba dareenka wuxuu ku leeyahay muhiimad xagga fasiraadda ah. haddaba, tani kama tarjumayso AORIST ACTIVE INDICATIVE ka oon marwalba lahayn muhiimad xagga naxwaha ah. tusaale ahaan: Rooma 6:10 (labo jeer).

C. Habaynta erayada luqada Koine ee Giriigga

1. Luqada Koine ee Giriigtu waxay ahayd luqad aan sida Ingiriisida oo kale ku tiirsanayn habaynta erayada, sidaasi darteedna, qoraagu wuxuu ka leexan karaa caadi ahaan habayntii laga rajaynayay inuu muujiyo

- a. Wixii qoraagu uu rabay inuu u sheego akhristaha
- b. Wixii qoraagu ku fikirayay wuxuu ka yaabin karaa akhristaha
- c. Wixii qoraaga si qoto dheer u dareensanaa wuxuu ku saabsanaa

2. Habaynta caadi ahaaneed ee luqada Giriigtu ilaa hadda waxay tahay midaan sugnayn. Haddaba, habaynta caadi ahaaneed laga hadlayaa waxay tahay:

a. Falalka isku xidhistooda

- (1) FAL
- (2) FAL SAMEEYE
- (3) DHAMMAYS TIR

b. Falalka hakashada ku jira

- (1) FAL
- (2) FAL SAMEEYE
- (3) MAFCUULKA
- (4) MAFCUULKA AAN TOOSKA AHAYN
- (5) MEELEEYAYAASHA

c. Cibraarooyinka magacyada

- (1) MAGAC
- (2) DIB U HABEEYAHA
- (3) MEELEEYAYAASHA

3. Habaynta erayadu waxay noqon kartaa mid noqon karta muhiim. Tusaale ahaan:
 - a. “na siiyeen gacanta midigta oo wehelnimada” (Galatiya 2:9). Cibaarada “midigta wehelnimada” way kala qaybsan tahay iyadoo soo horraysiisay tusidda muhiimaddeeda.
 - b. “la jira Masiixa” (Galatiya 2:20), ayaa lasoo horraysiiyay. Dhimashadiisana waxa la geliyay dhexda.
 - c. “siyaalo badan oo kala duduwan” (Cibraaniyada 1:1), waa la horraysiiyay. Waxaanay ahayd sida Ilaah sida Ilaah naftiisa u muujiyay oo kala duwanayd, laakiinse maaha xaqiiqada waxyiga.

- D. Caadi ahaan darajooyin adkaynta ah ayaa lagu muujiyay
 1. Adkaynta magac u yaalka kaasoo hore uga mid ahaa falka. Tusaale ahaan: “oo bal eega had iyo goor ayaan idinla jooga..” (Matayos 28:20).
 2. Maqnaanshaha xidhiidhiyaha la filayay ee erayada amaba weedhuha, waxa lagu magacaabay asyndeton (“aan boodayn”). Waxa la filayay xidhiidhiyaha, sidaasi darteedna maqnaansheheedu dareenka ayuu soo jeedinayaa. Tusaale ahaan:
 - a. Fikirrada wanaagsan, ee Matayos 5:3 (adkaynta waxyaalahaas)
 - b. Yooxanaa 14:1 (mawduuc cusub)
 - c. Rooma 9:1 (qayb cusub)
 - d. 2 Korintos 12:20 (adkaynta waxyaalahaas)
 3. Adkaynta erayada amaba cibaarooyinka ku dhex jira qoraalka gaaban ee aayadaha. Tusaale ahaan: “ammaanitaanka cisadiisa”(Efesos 1:6,12 iyo 14). Waxaana ereyadan loo adeegsaday sheegitaanka shaqada uu leeyahay ruux wal oo ka mida Saddexmidnimadu.
 4. Adeegsiga erayga amaba cibaarooyinka codkoodu muuqanayo
 - a. euphemisms – beddelka erayada ku saabsan xarrimaadaha sida “seexashada” dhimashada (Yooxanaa 11:11-14) amaba “cago” sida ka muuqata (Ruud 3:7-8; 1 Samuu’eel 24:3).
 - b. circumlocutions – beddelka erayada loo adeegsado magaca Ilaah, sida “Boqortooyada janada” (Matayos 3:21) amaba “cod samada ka yimid” (Matayos 3:17).
 - c. Xaqiiqanimada hadalka
 - (1) Buunbuuninta aan suurto galka ahayn (Matayos 3:9; 5:29-30; 19:24).
 - (2) Dabacsanaanta odhaahyada (Matayos 3:5; Falimaha Rasuullada 2:36).
 - (3) Waxyaabaha la xidhiidha shakhsiyaadka (1 Korintos 15:55).
 - (4) Jeesjeeska (Galatiya 5:12)
 - (5) Qoraallada gabayga ah (Filiboy 2:6-11)
 - (6) Codka ka dhex muuqda erayada
 - (a) “kaniisad”
 - (i) “kaniisad” (Efesos 3:21)
 - (ii) “yeedhitaan” (Efesos 4:1,4)
 - (iii) “yeedhay” (Efesos 4:1,4)
 - (b) “xor”
 - (i) “naag xor ah” (Galatiya 4:31)
 - (ii) “xornimo” (Galatiya 5:1)
 - (iii) “xor” (Galatiya 5:1)
 - d. Erada luqada – luqada oo badanaa ah dhaqan iyo luqada gaarka ah:
 - (1) Waxay ahayd adeegsiga tusaale ahaaneed ee “cunto” (Yooxanaa 4:31-34).
 - (2) Wuxuu ahaa adeegsiga tusaale ahaaneed ee “Macbad” (Yooxanaa 2:19; Matayos 26:61).
 - (3) Wuxuu ahaa erayada Cibraaniga ah ee naxariista, “nacayb” (Bilowgii 29:31; Sharciga Kunoqoshadiisa 21:15; Tesaloniika 14:36; Yooxanaa 12:25; Rooma 9:13).
 - (4) “Dhammaan” iyo “badan.” Is barbar dhig Ishacyaah 53:6 (“dhammaan”) iyo 53:11 iyo 12 (“badan”). Erayadani waxay yihiin synonymous sida Rooma 5:18 iyo 19.
 5. Adeegsiga erayo buuxa halkii laga adeegsan lahaa mid keliya. Tusaale ahaan: “Sayid Ciise Masiix.”
 6. Adeegsiga gaarka ah ee *autos*
 - a. Marka uu la socdo shaqalka waxa loo tarjumay “la mida.”

b. Marka aanu la soconin shaqalku waxa loo tarjumay sida magac u yaalka INTENSIVE RFLXIVE PRONOUN ka –“laftiisa,” amaba “lafteeda.”

- E. Ardayda akhrinaysa Baybalka aan Giriigga ahayni waxay xoojinta ku ogaan karaan siyaabo kala duwan:
1. Adeegsiga qoraallada faahfaahsan ee isugu jira Giriigga/Ingriisida.
 2. Isbarbar dhigista tarjumaadaha kala duwan ee Ingriisida. Tusaale ahaan: (KJVE, NKJV, ASV, NASB, RSV, NRSV) iyo kuwa kalee la midka ah (Williams, NIV, NEB, REB, JB, NJB, TEV). Waxa kaloo caawimaad laga fiican laga heli karaa *The Bible in Twenty-Six Translations* oo uu daabacay Baker.
 3. Adeegsiga *The Emphasized Bible* oo uu leeyahay Joseph Bryant Rotherham (Kregel, 1994).
 4. Adeegsiga tarjumaadaha kale ee badan
 - a. *The American Standard Version* ee 1901
 - b. *Young's Literal Translation of the Bible* oo uu leeyahay Robert Young (Guardian Press, 1976).

Haddaba barashada naxwuhu way adagtahay laakiinse waxay lagama maarmaan u tahay fasiraadda haboon. Qeexitaanadan kooban amaba faallooyinkan iyo tusaalayaashan waxa loogu talo galay inay caawiyaan dadka aan Giriigga ahayn ee akhrinaya naxwaha uu koobsanayo Kitaabkani, hubaashiina waa la fududeeyay qeexitaannada. Waxa loogu talo galay inaanay noqonin kuwo adag oon dabacsanayn, laakiinse inay noqdaan tallaabo wax ku oola oo fududaynasa fahmitaanka kitaabka Axdiga Cusub. Sidoo kale waxaan rajaynaynaa in qeexitaannadani ay akhristayaasha u fududayn doonaan faallooyinka amaba fasiraadaha ay mufasiriinta kale ka bixiyiin Axdiga Cusub.

Waa inaan awood u yeelano inaan fasiraaddeena ku salayno macluumaadka uu xanbaarsanyahay qoraalka Kitaabku, laakiinse naxwuhu isna waa mid aad ugu muhiima arrintan. Waxyaalaha kale waxay iyana noqon karaan dhinaca taariikhda, macnaha qoraalku xanbaarsanyahay ee xagga suugaan ahaaneed, adeegsiga erayga iyo aayadaha isku midka ah.

LIFAAQA LABAAD

CANBAARAYNTA QORAAL AHAANEED

Mawduucani wuxuu khuseeyaa sidii loo sharixi lahaa qoraalka ku dhex sugan tafsiirkan, waxaana la adeegsan doonaa guudmarkan:

- I. Ilaha qoraal ahaaneed ee Baybalka Ingiriisida ah
 - A. Axdiga Hore
 - B. Axdiga Cusub
 - II. Sharrixitaanka kooban ee dhibaatooyinka iyo aragtiyaha “canbaaraynta qoraal ahaaneed.”
 - III. Meelaha loogu noqon karo akhriska dheeraadka ah
- I. Ilaha qoraal ahaaneed ee Baybalka Ingiriisida ah
- A. Axdiga Hore
 1. Masoretic Text (MT) – Qoraalka Cibraaniga ah waxa dejiyay Rabbi Aquiba markii taariikhdu ahayd 100 C.D. Dhibcaha shaqallada, lahjadda, xarakada iyo waxyaalaha la midka ah waxa lagu daray qarnigii lixaad ee C.D. waxaana la dhammeeyay qanigii sagaalaad ee C.D. waxaana sameeyay culimada Yuhuudda ee loo yaqaanay Masoretas. Haddaba, qaabka qoraal ahaaneed ee ay adeegsadeeni wuxuu la mid ahaa ka Mishnah, Talmid, Targums, Peshitta, iyo Vulgate.
 2. Septuagint (LXX) – Dhaqan ahaan waxa la yidhaahdaa Septuagint ga waxa soo saaray culimmo Yuhuuda oo tiradoodu dhammayd 70 iyagoo kuna dhammays tiray 70 cisho, waxaanay u soo saareen maktabadda Aleksandariya iyada oo uu maal gelinayo Boqor Blotemigii labaad (285-246 C.H). Waxa haddaba tarjumaadda codsaday oo soo jeediyay hogaamiye Yuhuudi ahaa oo ku noolaa Aleksandariya, waxaana odhaahdan dhaqan ahaaneed sheegaysa “Letter of Aristeas.” Haddaba, LXX ka waxa lagu saleeyay qoraal dhaqan ahaaneed oo Cibraani ah isla markaasna ka duwan qoraalka Rabbi Aquiba (MT).
 3. Dead Sea Scrolls (DSS) – waxa lagu dhex qoray Roomaanka Masiixa hortiis (200 C.H ilaa 70 C.H) waxaana qoray qolo Yuhuuda oo la odhan jiray “Essenes.” Haddaba, qoraallada Cibraaniga ah waxa laga helay agagaarka Badda Dhimatay, waxaanay mujiinayaan xoogaa inay ka duwanaayeen qoraallada MT iyo LXX ka.
 4. Waxa jira tusaalayaal muhiima oo ku saabsan is barbardhiga qoraalladani siduu mufasiriinta uuga caawiyay fahanka Axdiga Hore.
 - a. LXX ku wuxuu culimada mufasiriinta ah iyo tarjumayaasha ka caawiyay fahanka MT
 - (1) LXX ka Ishacyaah 52:14, “sidii kuwa badanu ula yaabi jireen oo kale.”
 - (2) MT ga Ishacyaah 52:14, “sida kuwo badani kuula yaabeen.”
 - (3) Ishacyaah 52:15 dhexdeeda magac uyaalka LXX ka waxa laga dhigay
 - (a) LXX, “sida quruumo badani uuga yaabi doonaan isaga”
 - (b) MT, “wuxuu yaab gelin doonaa quruumo badan.”
 - b. DSS ku wuxuu tarjumayaasha iyo culimada ka caawiyay fahanka MT
 - (1) DSS ka Ishacyaah 21:8, “wuu qayliyay oo wuxuu yidhi, waxaan jooga meeshayda waardiyaha.”
 - (2) MT ga Ishacyaah 21:8 “wuxuu u qayliyey sidii libaax oo kale oo yidhi, Sayidow, maalintii oo dhan waxaan had iyo goorba ku kor taagnahay munaaradda.”
 - c. LXX ka iyo DSS ka labadooduba waxay faahfaahiyeen Ishacyaah 53:11
 - (1) LXX iyo DSS, “markuu arko naftiisa wuxuu arki doo iftiin, waanu u riyaaqi doonaa”
 - (2) MT, “Wuxuu arki doonaa waxay naftiisu ku dhibtootay, wuuna u riyaaqi doonaa”
 - B. Axdiga Cusub
 1. In ka badan 5300 oo qoraal isla markaana ah gebi ahaanba qaybaha Axdiga Cusub ee Giriigga ayaa jira. Ku dhowaad 85 waxa lagu qoray waraaqo hore iyadoo 268 qoraal ay yihiin kuwo lagu qoray far waayayn (uncials). Intii ka dambaysay qarnigii sagaalaad C.D., waxa la sameeyay qoraallo badan, iyadoo qoraallada lagu qoray Giriigga ay ahaayeen ku dhowaad 2700. Waxa kaloo la hayaa 2,100 nuqul ahna Qorniinka isla markaasna loo adeegsaday caabudaadda.

2. Ku dhowaad 85 kamida qoraallada Giriigta oo koobsanaya qaybo ka mida Axdiga Cusub ayaa waxa lagu hayaa matxafyada. Kuwo ka mida qoraalladaasna waxay taariikhdoodu u noqonaysaa qarnigii labaad ee Masiixa dabadiis, laakiinse badankooda waxay taariikhdoodu u noqonaysaa qarnigii afraad ee C.D. Haddaba, MSS ku ma koobsanayo Axdiga Cusub oo dhan, maxaa yeelay nuqulladan uugu da'doodu aadka u wayntahay ee Axdiga Cusub maaha macneheedu in loogala jeedo iyaga oo kala duwan. Kuwo badan oo ka mida waxa loo koobiyeeyay adeegisaga, sidaasi darteedna maadaama oo aan daryeelka dan laga gali jirin waxay ka koobsanayaa kala duwanaansho badan.
3. Codex Sinaiticus ka, waxa loo yaqaanay xarafka Cibraaniga ah ee a (*aleph*) amaba (01), Waxa laga helay St. Catherine ee Buur Siinay dusheeda, waxaana helay Tischendorf. Waxaanay taariikhdeedu u laabanaysaa qarnigii afraad ee C.D. waxaanay ka koobantahay LXX ka Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub ee Giriigga ah, waana nooca “Qoraalkii Aleksandariyiinta.”
4. Codex Alexandinus, waxa loo yaqaanaa “A” amaba (02), waana qoralladii Giriigga ee ahaa qarnigii shanaad isla markaasna laga helay magaalada Aleksandariya ee waddanka Masar.
5. Codex Vaticanus, waxa loo yaqaanaa “B” amaba (03), waxaana laga helay maktabadda Faatikaanka ee Rooma, taariikhdeeduna wuxuu u laabanayaa badhtamihii qarnigii afraad C.D. Waxaanay koobsanaysaa LXX ka Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub ee Giriigga ah. iyana sidoo kale waxay la mid tahay “Qoraalkii Aleksandariyaanka ”
6. Codex Ephraemi, waxa loo yaqaanaa “C” amaba (04), waana qoraaladii Giriigga ee qarnigii shanaad ee badh ahaantooda la baabiiyay.
7. Codex Bezae, waxa loo yaqaanaa “D” amaba (05), waana qoraaladii Giriigta ee qarnigii shanaad. Waxaana weeyi masuulka ugu sarreeya waxa lagu magacaabo “The Western Text” oo ah qoraallada reer galbeedka. Waxay koobsanaysaa waxyaalo badan oo lagu daray, waxaanay ahayd waxa ugu muhiimsan ee markhaatiga u ah tarjumaadda King James.
8. MSS ka Axdiga Cusub waxa loo kala saari karaa saddex qaybood amaba waxa suurto gala afar qaybood, oo wadaaga waxyaalo isku mida.
 - a. Qoraallada Aleksandariya ee Masar
 - (1) P⁷⁵, P⁶⁶, (ku dhowaad 200 C.D), waxaana lagu diiwaan geliyay Injiillada.
 - (2) P⁴⁶ (ku dhowaad 225 C.D), waxaana ku diiwaan gashan waraaqihii Bawlos.
 - (3) P⁷² (ku dhowaad 225-250 C.D), waxaana ku diiwaan gashan Butros iyo Yuudas
 - (4) Codex B, oo lagu magacaabo Vaticanus (ku dhowaad 325), waxaanu koobsanayaa Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub oo dhammays tiran.
 - (5) Xigashooyinka Origen ee nooca qoraalladan
 - (6) MSS ka kale ee tusinaya qoraallada noocan ahi waa a, C, L, W, 33.
 - b. Qoraallada gablbeedka ee Waqooyiga Afrika
 - (1) Waxyaalahii lagasoo xigtay wadaadadii kaniisadda Waqooyiga Afrika sida, Tertullian, Cyprian, iyo tarjumaadihii Laatiinka ee Hore.
 - (2) Waxyaalihii lagasoo xigtay Irenaeus
 - (3) Waxyaalaha laga soo xigtay Tatian iyo tarjumaadaha Old Syriac.
 - (4) Codex D “Bezae” ee raaca qoraalka noocan ah
 - c. Qoraallada bariga Byzantine ee Constantinople
 - (1) Qoraalkani noocan ahi boqolkiiba 80 wuxuu ka muuqanayaa 5300 ee MSS ka.
 - (2) Waxa lagasoo xigtay wadaadadii kaniisadii Antiokh ee Siiriya, Cappadoceans, Chrysostom, iyo Therodoret
 - (3) Codex A, ee Injiilada oo keliya
 - (4) Codex E, (qarnigii sideedaad) ee Axdiga Cusub oo dhammays tiran.
 - d. Nooca afraad ee suurta galka ahina waa “Caesarean” ee Falastiin
 - (1) Waxa laga dhex arki karaa Markos
 - (2) Markhaatiyada qaarkood ayaa sheegaya inay yihiin P⁴⁵ iyo W.

II. Dhibaatooyinka iyo aragtiyaha “canbaaraynta qoraal ahaaneed.”

A. Sida kala duwanaanshuhu usoo arooray

1. Kedis ahaan

- a. Ilduufka ku imanaya qoraalka gacanta ee laga yaabo inuu keeno khaladka erayada (homoioteleuton).
 - (1) Ilduufka amaba khaladka ku iman kara laban laabista xarafka amaba erayga (haplography).
 - (2) Kama'a amaba ilduufka xagga maanka ah iyadoo lagusoo celiyo erayo amaba sadar amaba iyadoo si khaldan loo qoro (dittography)
 - b. Ilduufka amaba khaladka ka iman kara yeedhiska (itacism). Hadiyo goorna khaladka xagga qoraalku wuxuu keeni karaa erayo codkoodu isku mid noqon karo luqada Giriigga.
 - c. Qoraalladii hore ee Giriiggu maha laha cutubyo iyo qaybinta aayadaha, sidoo kalena xarakada iyo meelaha bannaan ee u dhexeeya erayadu way yaraayeen ama mabay jirin.
2. Badheedhka
- a. Bedelitaanka waxa loo sameeyay si loo hagaajiyo qaab dhismeedka naxwe ahaaneed
 - b. Bedelitaanka waxa loo sameeyay si ay u waafaqaan aayadaha kale ee Kitaabka ka midka ah isla markaasna ay isku midka yihiin.
 - c. Bedelitaanka waxa loo sameeyay iyadoo la isku xidhayo labo ama akhrisyo kaloo ka badan
 - d. Bedelitaanka waxa loo sameeyay iyadoo la isku dayayo saxitaanka dhibaato ka muuqan karta qoraalka (1 Korintos 11:27 iyo 1 Yooxanaa 5:7-8)
 - e. Faahfaahin dheeraada sida hagaajinta taariikhda amaba fasirka haboon ee qoraalka ayuu sheekh kala xadeeyay, laakiin waxa dhici karta in sheekh kale uu isku dhex daray (Yooxanaa 5:4).
- B. Aragtida asaasiga u ah canbaaraynta qoraal ahaaneed (waxyaabaha caqli galka ah marka la akhrinayo qoraalka asalka ah hadii uu jiro is khilaaf)
1. Waxyaalaha ugu sirgaxan amaba qoraalka naxwe ahaan aan caadiga ahayni waa qoraalka asalka ah
 2. Qoraalka ugu gaabani waa ka asalka ah
 3. Qoraalka wayn waxa la siiyay culays badan sababtuna waa dhowaansheheeda taariikh ahaaneed ee asal ahaanta, wax waloo kalana isku mid bay ahaayeen
 4. MSS ka juquraafi ahaan kala duwani wuxuu leeyahay akhrinta asalka ah
 5. Caqiido ahaan qoraallada taagta yari, gaar ahaan kuwa la xidhiidha fiqiga ee is bedelaan, sida Saddexmidnimada 1 Yooxanaa 5:7-8 waana in la door bido.
 6. Qoraalka sida ugu fiican u sharrixi kara asalka kala duwanaanshaha
 7. Labo xigasho oo tusin kara isu dheellitirka dhibaatooyinkan kala duwanaanshaha
 - a. J. Harold Greenlee kitaabkiisa, *Introduction to New Testament Textual Criticism*,
 “Ma jirto caqiido Masiixi ah oo loo diidayo ka doodista qoraalka; ardayga Axdiga Cusubina waa inuu ka digtoonaado doonista ah inuu qoraalkiisu yahay asal kana xooggan yahay kii asal ahaan waxiyiga ahaa” (p.68).
 - b. W. W. Criswell ayaa Greg Garrison ka *Birmingham News* u sheegay in isagu aanu rumaysnayn in eray kasta oo Kitaabka ka mid ahi aanu ahayn waxyi, “ugu yaraan maaha eray kasta oo wakhtigan casriga ah ay sameeyeen tarjumaannadu.” Criswell wuxuu yidhi: “Anigu aadbaan u rumaysanahay canbaaraynta qoraal ahaaneed. Sida aan u malaynayana, qaybta ugu danbaysa cutubka 16 ee Markos waa faasiqnimo mana aha waxyi, laakiinse waa la isku dardaray...marka aad barbar dhigto qoraallada kale ma jiro mid gebo gebadiisu tahay sida Kitaabka Markos oo kale, qof ayaana ku daray...”
 Sidoo kale duqa SBC ayaa isna sheegay in sidoo kale loo fiirsan karo dhacdada ku diiwaan gashan Yooxanaa 5 ee ah Ciise iyo wartii Beytesda. Iyo sidoo kale falaqaynta labada waxyaalood ee ku saabsan Yuudas oo is dilay (Matayos 27 iyo Falimaha Rasuullada 1): “Waa aragtiyo kala duwan oo is dilitaan ah.” ayuu yidhi Criswell. “Haddii ay ku jirto Kitaabka, waxa loo hayaa sharraxaad iyadoo labada meelood ee sheegaya is dilitaanka Yuudasna ay ku sugan yihiin Baybalka.” Waxa kaloo Criswell intaas uu raaciyay, “Canbaaraynta qoraal ahaaneed iyada lafteeda ayaa isu ah cilmi layaab badan. Mana aha wax kooban, mana aha edeb darro, laakiinse waa wax jira oo udub dhexaad ah...”

III. Dhibaatooyinka qoraallada

- A. Meelaha amaba maraajicda loogu noqon karo akhris dheeraad ah:

1. *Biblical Critiscism: Historical, Literary and Textual*, waxaana leh R. H. Harrison
2. *The Text of the New Testament: Its Transmission, Corruption and Restoratoin* oo uu leeyahay Bruce M. Metzger
3. *Introduction to New Testament Textual Criticism*, oo uu leeyahay J. H Greenlee

AAQA SADDEXAAD

MACNAHA ERAYADA CUSUB

Adoptionism. Waa aragtiyihii hore ee Ciise marka la eego xidhiidhka uu la leeyahay ilaahnimada. Waxay markaasi sheegaysaa in Ciise uu ahaa aadane caadi ah iyadoo si gaarana uu Ilaah xidhiidh uula yeeshay markii la baabtiisay (Matayos 3:17; Markos 1:11) amaba sarakicistiisii (Rooma 1:4). Ciise noloshiisu waxay ahayd mid tusaale u ah Ilaah, marka dhinac laga eegana baabtiisamkiisii iyo sarakiciddiisii waxay ka dhigeen Wiilka Ilaah (Rooma 1:4; Filiboy 2:9). Haddaba middani waxay ahayd aragtidii kaniisaddii hore iyo intii ka horraysay qarnigii siddeedaad. Halkii Ilaah ka noqon lahaa nin oo isu soo ekaysiin lahaa, ayaa waxay tilmaamaysaa in ninkii uu isagu noqoday Ilaah!

Way adagtahay sida loo sheego Ciise inuu yahay Ilaah Wiilka ah, iyo sida uu tusaale ugu ahaa nolosha Ilaah. Haddaba, hadii ugu horrayntiiba uu ahaa Ilaah, sidee marlabaad loogu abaal marin karaa amaba loogu sharrixi karaa Ilaahnimo? Haddii ugu horrayntiiba jiray oo ahaa Ilaah sidee baa loo siin karaa tix gelin dheeraad ah? inkastoo ay adagtaha inaan innagu garano, haddana Aabbuhu wuxuu Ciise siiyay tix gelin gaara oo ku salaysan sida wanaagsan ee uu u fuliyay doonista Aabbaha.

Alexandrian School. Qaabkan ah fasiraadda Baybalku wuxuu ahaa mid lagu samayn jiray magaalada Aleksandariya ee waddanka Masar qarnigii labaad C.D. waxaanu adeegsanayaa nidaamka fasiraadda ee Philo oo ka mid ahaa xertii Plato, waxaana lagu magacaabi jiray qaacidada amaba nidaamka maldahan. Wuxuu saamayn ku lahaa kaniisadda ilaa lagasoo gaadho wakhtigii uu samaysmay Borotastanku asal ahaanteeduna waxay u noqonayaan Origen iyo Augustine. Eeg Moises Silva kitaabkiisa, *Has The Church Misread The Bible?* (Academic, 1987).

Alexandrinus. Qoraalkan Giriigga ah ee u noqonaya qarnigii shanaad kana socda Aleksandariya, wuxuu koobsanayaa Axdiga Hore, Apocrypha, iyo Axdiga Cusub. Waana markhaatiga ugu wayn ee gebi ahaanba Axdiga Cusub ee Giriigga ah (marka laga reebo qaybo ka mida Matayos, Yooxanaa, iyo 2 Korintos). Marka haddaba qoraalladan oo ah “A” iyo kuwa ah “B”(Vaticanus) ay isku waafaqaan akhrista, waxa culimada badankoodu kasoo qaadaan inay yihiin qoraallada tusaalaha u ah asalka.

Allegory. Waa nooc ka mida tafsiirrada Baybalka oo asal ahaanna waxa qoray Yuhuuddii Aleksandariya, waxaana caan ku ahaa Philo gii reer Aleksandariya. Asal ahaanna waxay xoojinayaan sidii Qorniinku ku noqon lahaa mid leh dhaqan iyo faylasofuyad isku mida iyadoo laga tegayo dhacdooyinka taariikh ahaaneed amaba dhacdooyinka suugaan ahaaneed. Waxa uu raadiyaa macno ruuxi ahaaneed oo ka danbeeya qoraalkasta oo ka mida Qorniinka. Waa waa in la ogsoonaado waxyaalaha Masiixu ku sheegay Matayos 13, iyo Bawlos ee Galatiya 4 waxaanay tusaale u tahay xaqiiqada.

Analytical lexicon. Kani waa nooc ah qalab baadhitaan oo suurto gelinaya sidii lagu garan lahaa eray kasta oo Giriiga isla markaasna ku sugan Axdiga Cusub dhexdiisa. Wuxuu koobsanayaa erayada Giriigga ah iyo qeexitaankooda, waxaanu markaas akhristyaasha xerta ah u suurto gelinayaa oo ka caawinayaa fahanka macnaha erayada Giriigga ah iyo naxwaha.

Analogy of Scripture. Tani waa cibaarada lagu cabiro laguna sheego in dhammaanba Kitaabku uu yahay waxyiga Ilaah, sidaasi darteedna malaha wax iska hor imaada laakiinse wuu isu dheelli tiran yahay. Aragtidani haddaba waa midda gun dhigga u ah adeegsiga aayadaha isku midka ah iyo fasiraaddooda.

Ambiguity. Waxay tilmaamaysaa hubitaan la'aanta ka imanaysa marka ay jiraan qoraallo leh labo macnayaal amaba ka badan oo suurto gal ah isla markaasna hal mar lawada sheegay. Waxa suurto gal ah Yooxanaa oo adeegsaday middan xanbaarsanaan karta labada waxyaalood ee suurto galka noqon kara.

Anthropomorphic. Macneheedu waxa weeyi “haysashada dabecada amaba qaabka la xidhiidha aadanaha,” waxaana loo adeegsaday sheegitaanka diinteenna ku saabsan Ilaah, asal ahaanna waxay ka timid erayga

Giriigga ah ee tilmaamaya aadanaha, waxaana loogala jeedaa inaan Ilaah uga hadalno sidiiyoo uu nin yahay. Maxaa yeelay Ilaah waxa looga hadlaa jidh ahaan, nafsad ahaan iyo fikir ahaan intaba, waxaana loo adeegsadaa erayo la xidhiidha aadanaha (Bilowgii 3:8; 1 Boqorradii 22:19-23). Si kastaba ha ahaatee, ma jiraan erayo kale oon ahayn kuwa aadanuhu isu adeegsan karo inaan adeegsano, sidaasi darteedna cilimiga amaba aqoonta aan Ilaah u leenahay waa mid kooban.

Antiochian School. Qaabkan fasis ahaaneed ee Baybalka waxa lagu horu mariyay Antiyokh, Siiriya qarnigii saddexaad C.H. waxaanu ka jawaab celinayay nidaamkii maldahnaa ee lagu adeegsan jiray magaalada Aleksandariya ee Masar. Haddaba, ujeedadiisa asaasiga ahaydi waxay ahayd in diiradda la saaro macnaha ay samaynaso taariikhda ku sugan Baybalku, waxaanu Baybalka u fasirayaa si caadi ah. sidoo kale dugsigani wuxuu ka hadlay oo fara geliyay haddiiba Ciise Masiix uu leeyahay labo dabecadood (Nestorianism) amaba hal dabecad oo kaliya (Ilaah dhammays tiran iyo aadane dhammays tiran). Wuxuu dugsigani la xidhiidhay kaniisaddii Roomaanka iyo tii Aasiya laakiinse muhiimaddiisu way yarayd. Ugu dambayntiina wuxuu waddo u noqday fasiraadaha ku salaysan kitaabka ee ay raaceen Brotastanku (Luther iyo Calvin).

Antithetical. Waa mid ka mida saddex eray oo loo adeegsado macnaha xidhiidhka ka dhexeeya laynanka gabayada Cibraaniga. Waxay la xidhiidhaa layman gabay ah oo macnohoodu iska soo horjeedno (Maahmaahyadii 10:1, 15:1).

Apocalyptic literature. Wuxuu ahaa nooc gaar u ahaa Yuhuudda, waxaanu ahaa nooc ka mida qoraalka oo la adeegsaday wakhtiyadii Yuhuudda ay duullaanka ku ahaayeen awoodihii ajnebiga ahaa ee ku hareeraysnaa. Waxa ay u muuqataa inuu ku saabsanaa Ilaah oo maamula dhacdooyinka dunida oo dhan, iyo isaga oo si gaara dan uga leh Israa'iil isla markaasna ilaalinaya marwalba. Haddaba, qoraalladani waxay ballan qaadayeen in ay iman doonto guusha Ilaah een xadka lahayni.

Waxay markaasi wataa calaamooyin badan oo xitaa lagu muujiyay midabo, tirooyin, aragtiyo, riyooyin, dhexdhexaadinta malaa'igta, erayo sir ah iyo waxyaalaha ku dhex jira khayrka iyo sharka. Tusaal ahaan waxaan usoo qaadan karnaa (1) Axdiga Hore dhexdiisa, Yexesqeel (cutubyada 36-48), Daanyeel (cutubyada 7-12), Sekaryaah; iyo (2) Axdiga Cusub dhexdiisa, Matayos 24; Markos 13; 2 Tesaloniika 2 iyo Muujintii.

Apologist (Apologetics). Waxay asal ahaan ka timid luqada Giriigga waxaana weeyi "is difaacitaan sharciyaysan." Waa xishmad gaara oo fiqiga dhexdiisa ah isla markaasna raadisaa caddayn iyo doodo dhex mari kara caqiidooyinka Masiixiyadda.

A priori. Waxay asal ahaan la xidhiidhaa "run u eegaysiinta." Waxay tahay sabab u yeelista waxyaalaha hore loo aqbalay qeexitaankooda amaba heerka ay ugu muuqan karaan runta, waana midda lagu aqbali karo itixaamis la'aan.

Arianism. Ariyas wuxuu kaniisad dhaqaaleeye ka ahaa kaniisaddii Aleksandariya qarnigii saddexaad iyo kii afraad. Wuxuu markaasi sheegay in Ciise uu hore u jiray laakiinse aanu aanu lahayn awoodda ilaahnimada, waxaana suurta gala inuu raacayay Maahmaahyadii 8:22-31. Wuxuu la dooday wadaadkii Aleksandariya, oo bilaabay (318 C.D) dood sanado badan socotay. Haddaba, Arianism ku wuxuu noqday caqiidada Kaniisadda Bariga. Guddiga Nicaena ayaa haddaba 325 C.H ayaa xukumay Arius waxaanay carrabka ku adkeeyeen tayada iyo ilaahnimada Wiilka.

Aristotle. Wuxuu ka mid ahaa faylasuufyadii Giriigii hore, waxaanu ahaa ardaygii Plato, sidoo kalena wuxuu ahaa macallinkii Aleksandarkii Waynaa. Haddaba, saamayntiisu xitaa maanta waxay gaadhsiisan tahay waxyaabo badan oo khuseeya daraasaadka casriga ah, maxaa yeelay wuxuu adkeeyay oo sheegay aqoonta lagu heli karo wax u fiirsashada iyo ablo ablaynta, waana aragtiyaha uu aaminsanyahay sayniska.

Autographs. Waa magaca loo bixiyay qoraaladii asalka ahaa ee Baybalka. Qoraaladii asalka ahaa ee gacmaha lagu qoray way lumeen, waxaana la hayaa koobiyadii oo keliya. Haddaba tani waa meelaha loogu laaban karo qoraallada kala duwan ee Giriigga iyo Cibraaniga isugu jira wakhtigooduna horreeyay.

Bezae. Waa qoraal ah Giriig iyo Laatiin isla markaana u noqonaya qarnigii lixaad C.D. waxaana loo soo gaabiya “D.” waxaanu koobsanayaa Injiillada iyo Falimaha Rasuulda iyo sidoo kale kuwo ka mida Waraaqaha Guud ahaan. Waxa ay koobsanaysaa waxyaalo badan oo dheeraad ah, waxaanu samaynayaa waxyaalaha gundhigga u ah qoraallada Giriigga ee ka danbeeyay King James Version.

Bias. Waa eray loo adeegsaday qeexitaanka xooggan ee wax lagu tilmaamayo amaba aragtida ah. waa fikirka dhexdhexaad ahaaneed ee ka madax bannaan suurto galnimo la'aanta shay amaba aragti.

Biblical Authority. Waxa loo adeegsaday dareen gaar ah. waxa lagu qeexay fahanka laga qaadan karo asal ahaan qoraaga wixii maalmihiisii la odhan jiray iyo sida loogu dabaqi karo wakhtigan aan joogno. Haddaba, awoodda amaba amarka uu leeyahay Baybalku ayaa wuxuu yahay midka inna hagi kara oo keliya. Si kastaba ha ahaatee, iftiinkan dartiis waxaan xaddiday qaabka ah in Baybalka lagu fasiro naxwe ahaanta iyo taariikh ahaanta.

Canon. Waxa loo adeegsadaa qeexitaanka qoraallada la rumaysan yahay inay yihiin waxyi gaara, waxaana loo adeegsaday Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub labadaba.

Christocentric. Waxa loo adeegsaday Ciise . waxaan u adeegsaday is ku xidhista fahanka ah in Ciise uu yahay Rabbiga dhammaanba Baybalka. Axdiga Hore isaga ayuu sii sheegay, oo isaguna wuu dhammays tiray wixii lagu sii sheegay iyo ujeeddadiiba (Matayos 5:17-48).

Commentary. Waxa weeyi kitaab gaara oo baadhitaan ah. wuxuu tusinayaa fikradda guud ahaaneed ee kitaabka Baybalka, kaddibna wuxuu sharraxayaa qayb kasta oo ka mida kitaabka. Qaar waxay diiradda saaraan ku dabiqitaanka, halka kuwo kalena ay siyaabo kale uula tacaalaan qoraalka. Haddaba, kitaabadani waxbay caawinayaan laakiin waxa muhiima in la adeegsado marka qofku uu sameeyo baadhitaankiisa. Fasiraadda mufasiriinta waa inaan la aqbalin iyada oon ceeb loo raadinaynin. Haddaba, is barbar dhigista fasiraado badani waxay noqon kartaa mid caawimaad badan leh.

Concordance. Waa qalab baadhitaan oo loogu talo galay barashada Baybalka. Waxa ay diiwaan gelinaysaa saxsanaanta eray kasta oo kusoo arooray Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub, siyaabo kala duwan ayaanay wax u caawinaysaa: (1) Qeexitaanka erayada Cibraaniga amaba Giriigga ee ka danbeeya eray kasta oo Ingiriisi ah; (2) is barbar dhigista qoraallada loo adeegsaday erayada isku midka ah ee Cibraaniga amaba Giriigga; (3) tusidda meesha laba eray oo Cibraani amaba Giriiga ahi ku kala duwanyihiin isla markaana iyagoo isku mida loogu adeegsaday Ingiriisida; (4) muujinta soo noqnoqoshada erayo lagu dhex hubo buugaag amaba qoraayaal; (5) ka caawinta sidii qof ku heli lahaa aayado ka mida Baybalka (Walter Clark kitaabkiisa *How to Use New Testament Greek Study Aids*, pp. 54-55).

Dead Sea Scrolls. Waxa weeyi qoraallo taxane ah oo ku qoran luqada Cibraaniga iyo Aramaatiga isla markaasna laga helay agagaarka Badda Dhimatay 1947. Waxay ahaayeen maktabadihii diinta ee Yuhuuddii qarnigii hore. Cadaadiskii Roomaanka iyo dagaalladii 60 kii ayaa ku sababay inay ku dhex qariyaan godadka iyo waxyaalaha la midka ah. haddaba, waxay innaga caawiyeen fahanka Falastiintii qarnigii hore iyagoo ansixiyayna saxnimada Masoretic Text ka, iyo sida ay ugu noqonayaan casrigii hore ee C.H. Waxa iyaga loo soo gaabsadaa “DSS.”

Deductive. Nidaamka ku dhisan caqli galka amaba sabab u yeelistu wuxuu ka imanayaa waxyaalaha sida gaarka ah loogu yeeli karo macnaha iyo sababta. Waxay kasoo hor jeedaa sabab u yeelista saynisyahaddu ku dhaqmaan ee laga helo u fiirsashada si loo gaadho aragti kama danbays ah.

Dialectical. Waa nidaamka sababta u yeelaya waxyaalo iska hor imanaya iyada oo la raadinayo jawaabta midaynaysa ee koobsanaysa labada dhinacba. Caqiidooyin badan oo kitaabi ah ayaa waxay leeyihiin dhinacyo

ay isku khilaafsanyihiin, karti – doonis ; ammaan – adkaysi; rumaysad – camal; go’aan – edbin; xornimada Masiixiga – masuuliyadda Masiixiga.

Diaspora. Waxay ahayd erayga Giriigga ah ee Yuhuuddii Falastiiniyiintu u adeegsan jireen Yuhuudda kale ee ku noolaa dhul ka baxsan Dhulkii Ballanqaadka.

Dynamic equivalent. Waa aragti ah tarjumaadda Baybalka. Tarjumaadda Baybalku waxay noqon karaa “erayba eray” iyadoo ay tahay in eray kasta oo Ingiriisi ah in laga helo Cibraaniyada amaba Giriigga, iyo iyadoo la raaco “cibaaroyinka” oon in badan la tix gelinin in eray walba loo helo mid u dhigma. Haddaba “dynamic equivalent” gu wuxuu u dhexeeyaa labadan, waana in si runa loo qaato qoraalka asalka ah, laakiin loo tarjumo si waafaqsan qaabka naxwe ahaaneed ee casriga ah iyo fadhiisinta erayada. Haddaba, falaqayn fiican oo ku saabsan aragtiyaha tarjumaadaha waxa laga heli karaa kitaabka ay qoreen Fee iyo Stuart ee *How to Read the Bible For All Its Worth*, p. 35 iyo Robert Bratcher Hordhaca uu ka bixinayo TEV.

Eclectic. Waxa loo adeegsaday xidhiidhka ay la leedahay canbaaraynta qoraal ahaaneed, waxaanay sheegaysaa ku celcelinta amaba doorashada qoraallada kala gedisan ee Giriigga si loo soo dhiraan dhirriyo qoraalka ugu dhow asalka. Waxaanay diidaysaa aragtida ah in qofkasta oo qoys la ah qoraallada Giriiggu uu haysto asalka.

Eisegesis. Waxay kasoo horjeeddaa exegesis ka. Haddii markaas exegesis ku uu yahay “raacitaanka” ujeeddada asalka ah ee qoraaga, kanina wuxuu noqonayaa “keenista” aragti ajnebi ah.

Etymology. Waa qaabka barashada erayga si loo helo macnaha asalka ah ee eraygaas. Marka halkan laga bilaabo waxyaalaha asalka ah ee loo adeegsaday si fudud ayaa lagu heli karaa. Haddaba marka la eego xagga fasiraadda Etymology gu maaha mid ka muhiimsan macnaha casriga ah ee erayga.

Exegesis. Waa qaabka loo raaco fasiraadda aayadaha. Macneheedna waxa weeyi “in la raaco” ujeeddada iyo fahanka qoraaga iyadoo lana raacayo iftiinka taariikh ahaaneed, suugaan ahaaneed iyo sida macnaha loogu dabiqi karo wakhtiga la joogo.

Genre. Waa eray asalkiisu yahay Faransiis isla markaana loogala jeedo noocyo badan oo qoraallo ah. wuxuu xoogaynayaa qaybinta qoraalka oo loo kala saaro: taariikhi, gabay, maahmaah, iyo nidaama amaba sharci ahaan.

Gnosticism. Aqoonta ugu badan een u leenahay ayaa waxay ka imanaysaa qoraallada Gnostic ga ee qarnigii labaad. Si kastaba ha ahaatee, fikradahani sidoo kale waxay joojeen qarnigii koobaad iyo intii ka horraysay.

Waxa la sheegaa in kuwo ka mid ahaa caqiidooyinkii Valentian iyo Cerinthian Gnosticism ka qarnigii labaad ayaa waxay ahayeen: (1) waxa la taaban karo iyo ruuxu waxay ahaayeen kuwo isla xidhiidha. Waxa la taaban karaa waa shar ruuxunu wuu wanaagsan yahay, Ilaaha ruuxa ahina ma noqon karo mid si toos ah ula mida sharka; (2) waxa jira waxyaalo kasoo burqanaya Ilaah iyo sharkaba. Kan uguna bilowga iyo dhammaadka ahina waa YHWH Axdiga Hore oo ah kan sameeyay dunida (*kosmos*); (3) Ciise wuxuu ahaa mid ay wax kasoo burqadaan sida YHWH oo kale isla markaana wuxuu u ahaa mid u dhow Ilaaha runta ah. Waxa dadka qaar ay isaga gaadhsiiyaan heerka ugu sarreeya, laakiinse waxa hubaala inuu ka darajo hooseeyo Ilaah (Yooxanaa 1:14). Maadaama oo waxa la taaban karaa sharyahay Ciise muu haysan karin jidh bani aadan isagoo Ilaahna ah. Wuxuu ahaa ahaa ruux (1 Yooxanaa 1:1-3; 4:1-6); iyo (4) badbaadada waxa lagu helaa rumaysadka Ciise oo ay la socoto aqoon gaara taasi oo ah midda lagu yaqaano dadka gaarka ah. Aqoonta waxa loogu baahan yahay si loogu dhaafdo duniadan. Sidoo kalena qaynuunka Yuhuuddu wuxuu u baahna sidii lagu gaadhi lahaa Ilaah.

Macallimiintii beenta ahaa ee gnostic gu waxay ku dhawaaqayeen labo waxyaalood oo iska kasoo horjeeda; (1) kuwo ka mida qaab nololeedku waxay ahaayeen gebi ahaanba kuwo aan la xidhiidhin badbaadada. Waxay iyaga badbaadada iyo ruuxuba kuwo la isugu soo ururiyo aqoon qarsoon oo la xidhiidha caalamka malaa’igaha (*eons*); amaba (2) kuwa kalana, qaab nololeedku wuxuu u ahaa mid u muhiim ah badbaadada. Waxay ku adkaysteen in qaab nololeedka qofku uu caddayn u yahay ruuxa dhabta ah.

Hermeneutics. Waxa weeyi eray loo adeegsado hagista, waxaanu leeyahay waxyaabo gaara oo la raaci karo iyo hadiyad. Quduusnimada hadiyo goor waxa ay leedahay labo muhiimadood: muhiimad guud ahaaneed iyo mid gaar ahaaneed, waxaanay tani ku xidhantahay noocyada kala duwan ee ah qoraallada laga helo Baybalka. Nooc kastaa haddaba wuxuu haystaa jidkiisa u gaarka ah, laakiinse waxay sidoo kale wadaagaan waxyaalo isku mida xagga fasiraadda.

Higher Criticism. Waxay ka timid fasiraadaha Baybalka iyadoo muhiimadda siinaysa dhacdooyinka taariikh ahaaneed iyo qaabka suugaan ahaaneed ee kitaabada Baybalka.

Idiom . eraygan lagu isticmaalay weedhan waxaa laga helaa dhaqano kalad duwun kuwaas oo macnahooda takhsuska ahi uuu yahay. Inaanay sarbeebayso macnaha caadiga ah ee qofka ma erayga. Sida tusaalayaashan asliga ah qaar kood: waxa ay yihiin sida “Taasi waxa ay ahayd mid aad u xun fiican “ ama “waad idishay” Kitaabkana waxaa ku jira odhaayadaas noocaas oo kale ah.

Elumillumination magacani waa magaca la siiyo fekerka in Ilaahay bani-aadanka la hadlo. Macnaha buuxa ee fekradan waxaa badiyaa qeexaya: (1) Muujin -----Ilaahay ayaa metalay taariikhda bani-aadanka., (2) Waxyi-----Wuxuu siiyey fasirka saxda ah ee falalkiisa iyo macnahooda oo uu u dhiibay niman uu doortay si ay u ugu qoraan bani-adaanka. (3) Iftiimin wuxuu soo diray Ruuxsa si uu bani-aadanka uga caawiyo inay fahmaan daahfurka.

Inductive. Tani waa hab ama sabab macquul ah oo shay khaas ah meel ka kaxaysa oo arrin kale ku darta habka waaqiciga ah ee sayniska casriga ah. tani waxa ay aas aas ahaan tahay arragtiddii Aristotle

Interlinear. Habkanani waxa weeyaan nadaam qalab cilmi baadhiseed oo u ogaalanaya dadka aan akhrin Kitaabaku inay lafo guraan macnihiis iyo qaabkiisa. Turjumaada afka Ingisiisiga waxa ay ka dhigan tahay iyadii oo heer ilaa eray-ka eray looga soo qaadanayo luqada asal ah Kitaabka. Qalbakani waxa uu koobsadaa “lafo guris” aalad xaqiiq raadisa “oo marka afka Ingiriisiga ah la geliyo sheegaysa habka iyo qeexitaanka aas aasiga ay ku tahay afka Cibraaniga iyo Yuhuuda ”

Inspiration. Tani waa fekerka ah ina Ilaahay la hadlay bani-aadanka isaga oo ku hanuuniyaaya qoraayada Kitaabka inay si sax ah oo aan madmadow ku jirin u qoraan muujintiisa. Macnaha fekerka oo buuxa waxaa qeexa saddex weedhood: (1) Muujin- magacani waa magaca la siiyo fekerka in Ilaahay bani-aadanka la hadlo. Macnaha buuxa ee fekradan waxaa badiyaa qeexaya: (1) Muujin -----Ilaahay ayaa metalay taariikhda bani-aadanka., (2) Waxyi-----Wuxuu siiyey fasirka saxda ah ee falalkiisa iyo macnahooda oo uu u dhiibay niman uu doortay si ay u ugu qoraan bani-adaanka. (3) Iftiimin wuxuu soo diray Ruuxsa si uu bani-aadanka uga caawiyo inay fahmaan daahfurka.

Language of description. tan waxa ay xidhiidh la leedahay sarbeebaha ku qoran Axdiga Hore. Waxa ay ka hadashaa aduunkeena sida ay walxuhu ugu muuqadaan shanta dareeme. Maaha qeexitaan sayniseed ama loo lama jeedin caykaas inay noqoto.

Legalism. qaab fekar kan waxaa sal u ah aad xoog u saarista ama muhiimad siinta xeerar ama caadooyin diimeed. Waxa ay ka dhigan tahay in bani-aadanka wax qabadkiisu uu yahay sharciyo keenaya aqbalaada Ilaah. Waxa ay ka dhigan tahay xidhiidhka oo hoos loo dhigo korna loo qaado afcaasha gacmahu qabtaan, kuwaas oo labadooduba ah labada ha bee Xidhiidhka axdiga ee u dhexeeya Ilaaha quduuska ah iyo bani-aadanka

Lateral. Tani waa magac kale oo qoraal ahaan xooga saaraya nidaamyada taariikhiga ah ee qoraaladii hermeneutics ee Aniyokh. Waxa ay macnaheedu tahay in fasirka ay lug leeyihiin dadka caadiga ah ayna si cad macnaheedu ugu dhigan yihiin afka bani-aadanka, wallow haddana ay aqoosan tahay jiri taanka af maldahan.

Literary-genre. Tan waxa ay ku taxa luqdaa hababka kala duwan ee xidhiidhka bani-aadanku qaadan karo, sida gabayga, ama werinta taariikhiga ah iyo sheekooyinka. Nooc kasta oo suugaan ahi waxa uu leeyahay haan macno qarsoon u khaas ah oo lagu daray xeerka guud ee suugaanta qoran oo dhan.

Lateral- unit. tani waxa ay la xidhiidhaa fekradaha waaweyn ee Kitaabiga ah ee lagu laqasan yahay. Waxa ay ka koobnaan karaan aayado yar, sadaro, ama cutubyo. Waxa weeyaan qaybo isku filan oo leh oo ay bar dhexaad u tahay mawduuc.

Lower criticism. Eeg “Qoraaladaciladraadinta”

Manuscript. eray bixintani waxa ay la xidhiidhaa nuqulada kala duwan ee af ka gGiriiga ee laga helo Axdiga Cusub. Badiyaaba waxa ay u qabsan yihiin qaybo noocyo kala duwan oo (1) shayada ay ku qoran yihiin (Papyrus,saan,) ama (2) Qaabka qoraalada laftooda (Xarafaha waaweyn oo dhan ama qoraalada is dabo taxan) waxaa loo soo gaabiyey “MS” (keli) ama “MSS” (Jamac).

Masoretic –Text . Tani haddaba waxa ay ku saabsan tahay qoraaladii gacanta lagu qoray qarnigii sagaalaad CD ee qoraalada Cibraaniga ah ee Axdiga Hore ee ay iska soo dhaxleen facyow aqoonyahano Yuhuuda ah. kuwaas oo ka kooban qoraalo qodobaysan iyo iyo qoraalo kale oo macnaynaya. Waxa ay qaab ahaan tahay aas aaska qoraalada ku qoran Kitaabkeena Ingiriisiga ah ee Axdiga hore waxa ay waafaqsan yihiin qoraalada Cibraaniga ah MSS, khaas ahaan Ishaaciyaah ee caanka ku ah duubkii laga helay bada dhimatay. Waxaa loo soo gaabiyaa “MT”

Metonymy. Tani waa hadal maldahan oo magac shaylahaa loo adeegsaday inuu metelo shay kale kuwaas hore xidhiidh la leh. tusaale ahaan, “Kildhigu waa karayaa” dhaba ahaan manaheedu yahay “biyaha ku jira kidhigu waa ay karayaan”

Moratorium- Fragments. Tani waa liiska buugaagta ku jira laga reebay Axdiga Hore waxaa lagu qoray Rooma ka hor 200 CD. Waxaanay sheegayaan macno la mid ah todobaya iyo labaatanka buug ee Axdiga Cusub Madahabta Borosatanka. Waxa ay si cad u tusaysaa in kaniisadihii gudaha ee qaybaha kala duwan ee boqortooyadii Rooma “ay is ficil ah u dhigeen liiskii taxanaha ka hor kulankii weynaa ee golaha kaniisadu ay isagu timi qarnigii afraad”.

Natural revelation. Tani waa heer ka mid daahfurka Ilaah u daah furo dadka waxa ay ku lug leedahay nidaamka dabiiciga ah (Rooma1:19-20) iyo garashada niyad ahaaneed. (Rooma 2:14-15) waxaa kale oo laga hadlay (Sabuurada 19-1-6) iyo (Rooma 1:1). Wax ay cadaynaysaa muujinta khaaska ah ee habka khaaska ah ee uu Ilaahay isugu daahfuray Kitaabka. Iyo Ciisihii reer Nasareet ee awooda badnaa.

Wax baris diimeedka caynkan ah waxaa mar labaad muhiimada lagu siiyey “dunidii hore” dhaqdhaqaaq saynis ah oo ka dhex jiray masiixiyiinta dhexdooda (Tusaale, qoraaladii GUJH Ross) waxa ay carabka ku adkeeyeen qoraalka noocan ah ee sheegaaya inuu dhulku yahay abuurka Ilaah ee dhabta ah.

Dabeecadu waa albaab u furan oo ku saabsan aqoonta ama cilmiga Ilaah waxa ay ka duwan tahay muujinta kale (eek u taala Kitaabka). Waxa ay u ogolaataa saynisyahanada casriga ah fursad iyo xoriyad ay ku sameeyaan cilmi baadhis, hanaanka dabiiciga ah. aniga rajigayga waxa ay ala tahay fursad cajiiba inaan arko sayniska casriga ah ee dunida galbeedka.

Nestorianism. Nestorius Nestoriyas waxa uu ahaa odayada qarnigii sanaad waxa lagu soo tabo baray antiyokh dii Suuriya wuxuuna cadeeyey in Ciise lahaa laba dabeecadood mid bani-aadan kaamila iyo mid Rabbaani buux ah. arrintan waxaa duway Oodhogoska kii Axkenderiya oo ku salaysan aragti hal dabeecad keli ya ah. Masreyos waxa uu ka walaacsanaa (hooyada yare e Ilaaha ah. ee laga dhigay maryan Mistooriyas waxaa ka hor yimi Cyril kii alaskaderiya iyo qoraaladiisii dahsoonaa iyo tababarkiisii ku soo qaatay Antioch ayaa waxa

ay u dub dhaxaad u ahaayeen. Naxwaha qoraalada taariikhiga ah iyo argtiyaha fekerka kitaabka, Xiligii ay alxcanderiya ahayd xarunta afarta gees (allegorical) ee iskuulka tafsiirka. Kama damabyntiina Misteriyos waa laga eray xafiiskii waana la mastaafuriyey

Original Author. tani waxa ay ku saabsan tahay qoraaga dhabta ah-qoraayada qoraalka.

Papyri qoraalada noocan ahi waxa ay ku qoran yihiin shayo laga keenay Masar. Waxa laga sameeyey alwaax webiga ka baxda taasi oo ay ku qoran yihiin nuqulada ugu dada weyn ee Axdiga Cusub eek u qoran afka Giriiga

Parallel passages. Waxa ay qayb ka tahay fekrada ah in Kitaabka oo dhammi yahay mid Ilaah soo dejiyey oo aan fasirkiisana ka mid noqon karaan curisyo aan la wada fahmi Karin micnahooda. Tani waxa kale oo ay tahay mid caawisa in la helo macnaha cad ee Curis leeyahay ee ku saabsan mawduuc iyo sidoo kale qoraalada kale ee ku saabsan mawduucyo kale.

Paraphrase. Tani waa magaca sheekooyinka tujumaada eek u yaala Kitaabka. Turjumaada Kitaabka waxaa loo arki karaa hanaan is dabataxan ka “eray ilaa eray” loo soo tabiyey, halka erayga Ingiriiska ahi ay tahay inuu soo ban dhigo xigashada eray kasta oo Cibraani anma Giriiga “Xigasho” halka fekrada oo qudha la turjumay xidhiidh sidaas lama sii laha asalka weedha ama erayda asalkoodii. Ladaas arragtiyoo d dhexdooda “waxaa jira isu dhignaansho fir fircoon ”

Kaas oo isku daya inuu si qoto dheer u qaato qoraaladii asalka ahaa laakiin u turjuma qoraalada naxwo ahaan iyo sarbeeb ahaanba. Run ahaatii falaqan aad u waagsan oo ku salaysan argtiyahaas kala duwan ee fasirka waxaa laga heli karaa buugga ama qoraalada Fee iyo Stuurta magacooduna ahaa how to read the Bible for all its Worth, p. 35

Paragraph. tani waxa ay tahay aas aas taas oo ah mid lagu xidhay ujeedooyinka laga leeyahay cutubada. Tani waxa ay ka mid tahay badhtamaha ee lagu horu mariyo. Hadii aan sii joogno oo aan guud ahaan ba rumaysano. Kuwan wax baadhayaa waxa ay lumiyeen waxii hore ee uu qoray qoraaga ujeedadiisa

Parochialism. kuwani waxa ay la xidhiidhaan ay aas aas ahaan ay iska xidheen kuwa aad ugu fekerka kuwa aqoonta u leh barashada Ilaah-iyo dhaqamada qaybahooda.

Paradox. Hadaba kuwani waxa ay la xidhiidhaan runta taas oo u muuqata inay is burinayaan, ilaa iyo hadda labadub waa run. in kasta oo mid walba kan kale ka taxadaraayey. Marka aan eegno qaab ka guud ahaan taas oo ay soo ban dhigayaan labad dhinacba. In ta badan Kitaabka ayaa runta soo bandhigaaya marka aan eegno qoraaldii hore (micne ahaan) qaybahoodii. Waxayaabaha Kitaabiga ah ma aha qaar laga soo dejiyey xidigaha. Laakin waxaa jira qiyaaso ay sameenayaan xidiguha.

Plato. Nin kaasi waxa ahaa mid ka mid ahaa dadkii mufakariinta ahaa ee Giriiga. Wuxuuna ahaa nin aad iyo aad saamayn iyo isbedelo ugu yeeshay marka aan fiirni Kaniisadii hore iyo iyo aqoonayahndii reer Alexandria, ee Masar, ka dib Augstains. Waxa uu soo jeediyey wax kasta oo dunida korkiisa ayaal inay yihiin kuwo ku lug leh meereey kala taas oo ay isku eeg yihin qaab ahaan xagga Ruuxa. Kuwa mufakafiinra ahi waxa ay ka war bixiyeen Plato “habab –iyo fekrado ” inay yihiin waxaabha Ruuxiga ah ee dunidan

Presupposition. Tani waxa ay la xidhiidhaa sidii aynu hab ahaan inagu wax u fahanay. Marar badan ayaan wax xukunaa marka aan eegno inagu ka hor inta ay naan ka war bixin waxa ay leeyihiin qoraalada qudhooda. Xitaa saadaalintu la garamaayo sida ay u ku salaysan xiliyadii hore waxa ay qiyaasayeen ama ay farmi karayaan

Proof-texting. Tani waxa ay tahay iyada oo la soo qaadanaayo sidi loo turjumi laha qoraalada iyada oo la soo qaadanaayo aayado iyada oo la fiiriyo qoraala loona fiirisanaayo xitaa, qabo dheedheer oo ka mid ah qoraaladaas qayb ahaan. Aayadahaasi waa qaar laga saaraayo wixii hore ee uu oqoray qoraagu kuwaas oo inta

badan ku yeelanaysa saamayn sidii aan u cadayn lahayn qofku fekradaha uu qabo in kasta oo ay halkaas marka aan joogno Kitaabku awooda leeyahay ee maha qoraaga.

Rabbinical Judaism. Xiligani waxa uu ahaa xiligii nolosha dadka Yuhuuda ah ay bilaabantay inay u qaxaan dhulkii (586-538).

Hadabab kii ay wadaadadu kaas oo macbudka joogan in laga saaray. Markaas ayaa kuwii khaaska ahaa macbudada ay samayn ku yeelatay dadkii Yuhuuda ahaa noloshooda. Kuwaasina waxab ay ahaayeen sida dhaqanka yuhuuda mid udub dhexaad u ah. dhaqan ahaan, is weheshi ahaan, iyo caabudidi iyada oo bara shada kitaabkuna noqday is weheshiga xagga aduunka diinta iyo nolosha. Ciise Masiix, maalin taasi “diinta iyo qoraalada” taasna waxa ay ahayd tusaalaha wadaadada kaas oo ka dhacay Magaalad juurasaalem sannadii A:D hab qoraalkani waxa uu ka muuqanayaa ayaadahaas iyada oo ay Ilaalinayso hogaaminta xagga dhaqanka iyo diinta Yuhuuda iyo noloshooda. Tani waxa ay ahayd dabeecad taas oo la sameeyo sharci ahaan iyada oo laga soo turjumaayo Tawaraada sidii aan hore ugu soo aragnay waxii ku saabsanaa dhaqanka (Talmud).

Revelation. Kani waxa weeye magac kaas oo oo Ilaahay si mucjiso ah ugala hadlay dadkiisa ferad dhamaystiran ayaa inta badan lagu xusay halkan saddex jeer “(1) Muujin -----Ilaahay ayaa metalay taariikhda bani-aadanka., (2) Waxyi-----Wuxuu siiyey fasirka saxda ah ee falalkiisa iyo macnahooda oo uu u dhiibay niman uu doortay si ay u ugu qoraan bani-adaanka. (3) Iftiimin wuxuu soo diray Ruuxsa si uu bani-aadanka uga caawiyo inay fahmaan daahfurka.”

Semantic field. Tani runtii waxa ay la xidhiidhaa asal ahaan macno kaas oo la xidhiidha erayada tani runtii waxa ay ku salaysan tahay kala duwanaanta erayada in ay kala duwan yihiin macno ahaan qoraaladaasi.

Septuagint. Kani waxa weeye magac lagu tutjumay luqada Giriiga iyo weliba Cibraaniiga Kitaabka Axdiga Hore.dhaqan ahaan ayaa waxa uu odhanayaa kuwaasi waxa ay ahaayeen kuwo la qoray ilaa iyo todoba cisho. Kuwaasina waxa ay ahaayeen aqoon yahanadii dhexdhexaadka ahaa ee Alaxkanderiya Masar. Maalintu dhaqan ahaan waxa ay ku dhowdahay 250 C.H. (sida runtii ah waxaa suuro gal ah inay suuro gal tahay intan lagu dhameeyey mudo ka badan boqolaal sano)kani waxa uu aha tujumaadii kaas lahaa calaamado sababta oo ah (1) waxa ay ina siinaysaa qoraaladii xiliyadii hore marka aan qoraaladaas bar bar dhigno kuwii Masoretiska qoraaladii cibraaniyiinta (2) tani waxa ay ina tusaysaa inaan fahano Yuhuuda iyo turjumaadhooda qarnigii saddexaad ilaa iyo kii labaad Ka hor C.H. (3)Tani waxa ay ina siinaysaa sida dadka Yuhuuda ah inay diideen Ciise guud ahaanba, ta cadaynaysaana waa “LXX”

Sanaiticus Kani waxa uu ahaa qoraalada Giriiga ee Qarnigii afraad C.H. tana waxaa helay nin aqoon yahayn ahaa oo Garamal ah Tishendorf, Meeshii St. Ctherine,s gurigii iyo Macbudkii Jabel Musa. Dhaqan ahaan waxa ay fadhiisan jireen Mt,Sinia. Taasina waxa ay ahayd mid laga soo qaabeeyey warqadii ugu horaysay marka la fiiriyo luqada Cibraaniyada taas oo loogu yeedho “*Xaruuf*” (N) waxa ay ka kooban tahay laba arimood oo laga helaayo Kitaabka Axdiga hore iyo Axdiga Cusub. Kuwaasina waxa ay ahaan kuwa ugu muhiimsan marka aan eegno taariikhdi hore MSS.

Spiritualizing. Tani waxa ay ahayd xiligii ay arintu goonida u ahayd qaabkii looga qaadi lahaa waxyaabaha taariikhiga a. iyo qoraaladu waxa ay leeyihiin micne ahaan inaga oo fiirinayna turjumaadaha ay ku salaysan yihiin kala duwanaanshahooda.

Synonymous. Waxa ay la xidhiidhaa mar xaladihii saxa ahaa mid waliba na waxa uu lahaa macne u kaas la mid ah (in kasta oo aanay sida xaqiiqada ah aanay ahan laba eray kuwaas ooh ore u dhamaystirmay isku noqnoqonaayey). Kuwaasi waxa ay ahaan qaar aad isugu dhow kuwaas oo xidhiidh leh kuwaas oo la isku bedeli karo hadii kala weedhaha qaar ayaa waxa ay luminayaan micnahooda. Xitaa waxa kale oo loo isticmaalaa in loo qaabeeyo hal iyo saddex ha boo ka mida Cibraaniyiintooda tusaalayaashooda. Tan macnaheedu waxa weeye inay jiraan laba sadar kuwaas oo samaynaaya macno isku mid ah oo run ah. (cf, ps 197:9).

Syntax . Kani waxa weeye eray Giriiga kaas oo xidhiidh la leh dhismaha weedhaha. Iyda oo la xidhiidha sida ay weedhu isugu xidhan yihiin. Isla markaasina ay samaynaayan fekrad dhamaystiran.

Synthetical. Kuwani waxa ay yihiin saddex arrimood oo la xidhiidha noocyada gabadyada ee Cibraaniyiinta. Kuwaasin waxa ay ka kooban yihiin gabayo kuwaas oo mid ba uu mid kale dhisaayo, iyaga oo macne samaynaaya. Mararka qaar ayaa “waxaa loogu yeedhaa” “cimilada” (cf, ps. 103:3)

Systematic Theology. tani waa arrimo kuwaas oo la xidhiidha kuna tiirsan turjumaadaha Kitaabka kuwaas oo lagu aqoonsanaayo xaalado macquula dabecad ahaan. Tani waa arin suuro gal ah, halkii ay ka noqon lahayd wax iska taariikhiya. Taas oo ay soo jeediyeen kuwo faro badan oo Masiixiyiinta oo ku talax tegay barshada fekradaha kala duwan. (sida Ilaahay, Bani-aadanka, dembiga iyo badbaadada Iwm).

Talmud Waxa aan halkan ka arkaynaa wax oo cadaymo ah kuwaas oo ahaa asal ahaan dhaqanada yuhuuda. Ilaahay ayaa waxa uu siiyey Yuhuuda inuu kula hadlay Muuse buutii Siinaay. Tani waxa ay ahayd arrin runa oo xigamad lahayd sannado faro badan macalimiinta dadka Yuhuuda ah. waxa jira laba qoraal oo ah Talmud iyo kuwii Baabylonka mudo kooban, intii aynaan dhamaystirn Falistiiniyiintii.

Taxtual criticism. Kani waxa uu yahay qoraalo kuwaas oo laga baranaayo Kitaabka Quduuska. Qoraaladaasi waa mid iska caadiya in la eedeeyo sababta oo ah lama hayo qoraalo asala kuwii la helayna waa ay kala duwanaayeen. Tani waxa ay inagu qasbaysaa inaan u trjuno inaan wixii hore ku laabano. (sida ugu dhow ee suuro galka ah). asal ahaan erayadaasi waxa ay ahaayeen kuwo laga soo sawiray Axdiga Hore. Kuwaasna banaa waxaa loogu yeedhaa “eedaynta ugu hoosaysa”

Taxtus Recept. Qaabkani waxa uu horu marinayaa habkii Elzervir qoraalkaas oo ahaa Greek NT sannadii 1633 A.C. runtii tani waxa ay ku salaynadu inay ka yimaadeen Giriiga Kitaabka AC kaas oo mid ka dib lagu soo saaray turjun ahaan luqada Giriiga in a Latin versions of Erasmus (1546-1559) (1624-1678). *Introduction to the textual Criticism of the New Testeman*, p. 27, A.T Robertson ayaa waxa uu yidhi “qoraaladan la yiraahdo Byzantine qoraaladaasi inta badan waxa aan heli karaa qoritaankooda” haddaba qoraalada Byzantine waxa ay ahaan kuwo qiimo lahaa marka aan eegno ugu yaraan saddexdii qoys kuwaas oo berigii hore Giriiru wax ku qori jireen (western, Alxcandria, Byzantine) waxa ay kuwani ka koobnaayeen kuwo badan oo qalad ka buuxo qarniyo hore qoraaladaas jiray. Haddaba si kastaba ha ahaatee, A.T Robetson ayaa xitaa waxa uu yidhi “Marka aan eegol qoraaladii la qoray waxa jiray waxyabo cadaynaya inay ahaayeen qoraalaasi kuwo jira” (P.21) kuwani waxa ay ahaayeen qoraalo Giriirga dhaqankiisa ah gaar (gaar ahaan Erasmus daabacaadii saddexaad sannadii n1522) habkaasina waxa uu ku salaysnaa Kitaabka King James Version of 1611 A.D

Torah. Tani waxa ay tahay hab “waxbarid” oo Cibraaniyiinta tan in yar oo ka mid ahi waxa ay ka soo jeedeen wax baridii Muuse (Bilowgii ilaa iyo Sharciga Kunoqoshadiisa) waxa ay ahaayeen yuhuuda kuwa inta badan awooda iska lahaa kuwaas oo ka la qaybnin jiray Cibraaniyiinta iyo Canon.

Typological. Kuwani waxa ay ahaayeen hab khaas ah kaas oo wax loo turjumo. Inta bana kuwan waxaa laga helayaa Kitaabka Axdiga cusub. Fariinahaasna waxaa looga jeeday calaamado suuro gal ah. ahadaba fariinta caykan ahi ee baadhitaanku waxa ay ahayd badanaa waxyaabaha ugu badan ee aas aaska u ahaa habkii Alxcandria. Sababtuna waxa ay ahayd waa ay dhaleecayn jireen fekradaha caykan oo kale ah iyo turjumaadaha. Mid haddaba ka mid ah tusaalayaashan oo aan isticmaalo lagana helaayo Kitaabka Axdiga Cusub.

Vaticanus. Kani waxa uu ahaa qoraaladii Giriiga ilaa iyo qaringii A.D tana waxa laga helayaa Maktabka faatikaanka. Asal ahaan waxa uu ka kooban yahay Kitaabka Axdiga Hore. Sida qoraaladii la helay ee Axdiga Cusub. Haddaba si kastaba ha ahaatee, qaar kuwaas ka mid ah ayaa lumay. (Bilowgii Sabuurrada, Cibraaniyada, iyo wadaadkii Philemon iyo Muujintii). Kuwani waxa ay ahaayeen qoraalo ina caawinaaya oo aad faa,iido u leh lana garan karo eraydii ay asal ahaan ka yimaadeen sawir ahaan.

Vulgate. Kani waxa uu ahaa magacii Jerimiyaah kaas oo lagu turjumay Kitaabka luqada taaliinka. Kuwaasina waxa noqdeen aas aas ama “qaar caadiya” Waxaana lagu turjumay kaniisada Catholic Roman. Xiligii la sameeyena waxa uu ahaa sannadii 380s A.D

Wisdom literature. Kani waxa uu ahaa noo ka mid ah qoraalada oo caadi ahaa xiligii hore una dhowaa dhinaca bari. (dunidan casriga ah). Waxa ay ahayd mid asal ahaa lagu tijaabiyey sidii ay jiinka cusubi loogu hogaamin lahaa nolol taas oo ah mid ay iyaga oo guulaystay ku noolaanayaan noloshopoda sida gabayada, maahmaaha, iyo maqaalada. Tani waxa ay ku wajahnady mid kasta iyo sidii loola xidhiidhi lahaa bulshada. Tani ma aha mid loo isticmaalayo taariikh. Laakiin waxa ay ku salaysan tahay nolosha iyo waayo aragnimadeeda iyo baadhi taanada. Kitaabka Ayuub iyo Gabaygii Sulaymaan waxa ay u ekeayd inay soo bandhigayso caabudaad taas oo la caabudayo YHWH, laakiin fekradan xagga diimaha ahi ma aha mid ay isku raacsan yihiin kuwo kasta oo ka mid ah bani-aadanka iyo waayo aragnimadooda xili kasta.

Haddaba sida nooc kastaaba ugu bilowdo runta guud ahaanta ah. haddaba si kastaba ha ahaatee, noocani ma aha mid lagu isticmaalay xaalada kasta oo aas aasiya.

Hadaba waxa ay ina weydiinayaan si qotodheer su,aal taas oo ku saabsan nolosha bani-aadanka. Inta badana waxa ay bedelaan diimaha iyo dhaqanka iyo fekradahooda. (Ayuub iyo Cesraa). Waxa ay leeyihiin hab kaas oo isku dheeli tiran iyada oo dareen ahaan si fudud looga jawaabi karo nolosha iyo qorshayaasheeda.

World Picture and worldview. Halkan waxaa jira qaab aan wax isku bar bar dhigi karo. kuwaasina waxa ay yihii labadan fekradood kuwaas oo la xidhiidha abuuritaanka. Marka aan eegno marxaladaha “sawirka dunida” waxa uu la xidhiidhaa “sidii” ay waxyaabo kala duwani “feradaha dunida” ay ula xidhiidhaan “Waa kee ” iminka xaaladahan waxa aan si cad ugu turjumaynaa oo aynu ka helaynaa Kitaabka Bilowgii 1-2 kuwaas oo si khaas ah ugu hadlaaya asal ahaan ka uu yahay, maha laakiin, sida abuurida.

YHWH. Kani waxa uu yahay Axadi magaca Ilalah marka aan eegno Kitaabka Axdiga Hore. Taas oo lagu aqoon sanaayo Baxniintii 3:14. Tani waxa ay tahay ISLA WADAAGIDII xaaladihii kuwii Cibraniiyiinta “inay ahaadaan” kuwa yuhuuda ahi waxa ay ka baqayeen inay magaca ku dhawaaqaan. Ugu yaraan waa ay ka xumaadeen, sidaasi daraadeed, waxa ay isku dhiibeen Cibraaniyadii xiligii Adoinia “sayid” tani waa sida ay Axdiga kaas oo magac ahaan lagu turjumay Ingiriisi.

LIFAAQA AFRAAD

ODHAAH CAQIIDO AHAANEED

Anigu si gaar ah uma danaynayo rumaysad ama caqiido. Waxaa door bidayaa in baybalka qudhiisa. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waan xaqiiqsanahay in hadalka ku saabsan rumaysadka ee kuwa aan aadka ii aqoon ay ka fogaadaan in ay qiimeeyaan marka ay dhinaycayga caqiido ahaaneed eegaan. Xilligeennan ay dhagarta iyo qaladaadka. Soo koobiddan fiqigaygu waxa uu sheegayaa.

1. Baybalka, Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub labadaba waa waxyiga tooska ah, ee aan dhicidda lahayn, oo ah awood adduunka weligiis ah ee xukunka Ilaah. Waa muujinta Ilaah oo ay qoreen dad Ilaah siiyey awood xidhiidh oo Ilaah siiyey iyaga. Waa meesha aan ka helno runta cad ee ku saabsan Ilaah iyo ujeedkiisa. Sidoo kale waa runta rumaysadka iyo falimaha Kaniisaddiisa.

2. Waxaa jira Ilaaha keliya ee ah, madaxfurtaha, abuuraha, aan dhammaadka lahayn. Waa abuuraha wax walba, wax la arki karo iyo wax aan la arkin intaba. Isaga naf ahaantiisa ayaa jacaylkiisa iyo daryeelkiisi awgiis is muujiyey in kastoo isagu yahay xaq iyo caadil. Saddex shaqsiyad oo kala duwan ayuu nafsad ahaantiisu isu muujiyey” Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Qudduuska ah, kuwaasoo kala gaar ah haddana hal isku ah naf ahaan.

3. Ilaah adduunkiisa Isaga ayaa xukuma. Waxa uu uunkiisa u hayaa labadaba qorshe weligiis ah oo aan is beddel lahayn iyo mid shaqsi ah oo diiradda saaraya aadanaha doorashadooda xorta ah. ma jiraan wax dhici kara ogaanshaha iyo oggolaanshaha Ilaah la’aantood, iyadoo ay sidaas tahay ayuu haddana oggol yahay labadaba, malaa’igaha iyo aadanaha doorashooyinkooda. Ciise waa Nin Ilaah Doortay, dadka oo dhanna isaga ayey ku dhex dooran yihiin. Ogaanshaha Ilaah u sii leeyahay dhacdooyinka kama naaqusinayso aadanaha in ay xaqiiqsashada qorniinkii horay loo qoray. Dhammaanteen waxa aan masuul ka nahay fakarradeenna iyo camalladeenna.

4. Aadanaha, inkastoo laga abuuray aragga Ilaah oo ay dembi xor ka yihiin, haddaba iyaga ayaa doortay in ay Ilaah ka fallaagoobaan. In kastoo quwad iyaga ka sarraysa ay jirabtay, Aadan iyo Xaawo iyaga ayaa masuul ka ahaa doonistood naf ahaaneed. Fallaagonimadoodii ayaa aadanaha iyo uunka saamaysay. Ilaah naxariistiisa iyo nimcadiisa ayaan uga baahan nahay labadaba xaaladeenna guud ahaaneed ee Aadan nooga timid iyo doorashada fallaagonimadeenna shaqsi ahaaneed.

5. Ilaah macne cafis iyo dib u soo celin ah ayuu siiyey aadanihii dhacay. Ciise Masiix, Ilaah Wiilkiisa aan lala midka ahayn ayaa noqday aadane, isagoo ku noolaaday nolol aan dembi lahayn, oo dhimashadii uu booskayaga ku galay, ayaa waxa uu ku bixiyey dembigii aadanaha. Waa jidka qura ee soo laabasho iyo hehelnimo lagula yeelan karo Ilaah. ma jirto waddo badbaado oo kale, oo aan ka ahayn in loo soo maro shaqadiisii dhammaystirantay.

6. Dhammaanteen waxaa si shaqsi ahaaneed waajib noogu ah in aan deeqda Ilaah ee cafiska iyo dib u soo celinta ku helno Ciise Masiix. Tan waxa ay ku kaamilantay doonista runta ah ee ballammadii Ilaah noo soo maruyey Ciise Masiix iyo doonista rajada leh ee dembiga la og yahay.

7. Dhammaanteen waxa aan si buuxda cafis iyo dib u soo noqosho ugu helaynaa aaminista Masiixa iyo ka tawbadkeenista dembiga. Arrintu si kastaba ha ahaatee, caddaynta xidhiidhkan cusub waxaa lagu dhex arkayaa nolosha is beddeshay, ama is beddelaysa. Hadafka Ilaah ee ku aaddan aadanaha ma aha oo qura in ay maalin uun galaan jannada, laakiin u ekaanta Masiixa oo hadda ah. Kuwaa sida dhabta u haysta madaxfurashada u haysta, in kastoo ay si aan ula kac ahayn u dembaabaan, waxa ay noloshooda ku soo wadaan rumaysad iyo tawbadkeen.

8. Ruuxa Qudduuska ahu waa “Masiix kale.” Waxa uu adduunka u joogaa in kuwa lumay uu Masiixa u soo hoggaamiyo oo uu kuwa badbaadayna u ekaanta masiixa ku horu mariyo. Hadiyadaha Ruuxa waxaa lagu dhex bixiyaa badbaadada. Waa noloshii iyo adeegii Ciise oo lagu dhex qaybiyey jidhkiisa, kaniisadda. Hadiyadaha oo aasaas ahaan ah aragtiyada iyo ujeedooyinka Ciise ayaa waxa ay u baahan yihiin in ay soo saaraan midhaha Ruuxa. Ruuxu waa mid u firfircoon maalmahennan dhexdooda sidii uu waqtiyadii baybalka ahaa.

9. Aabbaha ayaa Ciise Masiixii dhimashada ka soo sare kacay ka dhigay xaakinka wax kasta. Adduunka ayuu ku soo laaban doonaa si uu u xukumo aadanaha oo dhan. Kuwa Ciise aamina ee magacooda lagu qoro buugga iftiinka ee nolosha waxa ay soo noqoshadiisa ku heli doonaan jidhkooda aammaanta ee weligii ah. Isaga ayey weligood la joogi doonaan. Ha yeeshee, kuwii diiday in ay ka jawaabaan runta Ilaah way go’naan doonaa farxadda wheel la ahaansha Ilaaha Qaaddirka ah. Waxaa iyaga lala xukumi doonaa shaydaanka iyo malaa’igihisa.

Tani sida hubaasha ah ma aha mid ebyan qma kaamil ah laakiin waxaan rajaynayaa in ay idin siin doonto dhadhanka fiqi ahaaneed ee qalbigayga ku jirta. Waxaan jeclahay hadalka ah”

“Aasaasyada ku jira—midnimada—dheeraad—xorroyad, wax kasta-- jacayl”